

TUSMADA BUUGGA

HORDHACA YOOXANAA	1
YOOXANAA 1	8
YOOXANAA 2	40
YOOXANAA 3	53
YOOXANAA 4	75
YOOXANAA 5	93
YOOXANAA 6	108
YOOXANAA 7	135
YOOXANAA 8	149
YOOXANAA 9	165
YOOXANAA 10	174
YOOXANAA 11	184
YOOXANAA 12	199
YOOXANAA 13	215
YOOXANAA 14	226
YOOXANAA 15	245
YOOXANAA 16	255
YOOXANAA 17	265
YOOXANAA 18	276
YOOXANAA 19	290
YOOXANAA 20	303
YOOXANAA 21	313
I YOOXANAA	320
I YOOXANAA 1:1-2:2	325
I YOOXANAA 2:3-27	335
I YOOXANAA 2:28-3:24	352
I YOOXANAA 4	372
I YOOXANAA 5	382
II YOOXANAA	397
III YOOXANAA	405
Lifaaqa Kowaad: Qeexitaanka Kooban Ee Naxwaha Erayada Giriigga	413
Lifaaqa Labaad: Canbaaraynta Qoraal Ahaaneed	422
Aaqa Saddexaad: Macnaha Erayada Cusub	425
Lifaaqa Afraad: Odhaah Caqiido Ahaaneed	435

Tusmada Mawduucyada Gaarka Ah

Archē	11
Malagga Rabbiga	13
Rumaysad (Pistis [Magac], Pisteuō [Ficil], Pistos [Sifo]	14
U Markhaati Furista Ciise	15
Garasho (Badanaa Tusaale Ahaan Loo Adeegsanayo Sharciga Kunoqoshadiisa)	16
Jidh (Sarx)	18
Ammaan (Doxa)	19
Jacayl Naxariis Leh (Hesed)	20
Aaminis, Isku Hallayn, Rumaysad, Iyo Rumaysad Yeelashada Axdiga Hore Dhexdiisa (x20)	
Aragtiyadii Bawlos Ee Sharcigii Muuse	24
Fariisiyiin	29
Jadwalka Magacyadii Rasuullada	35
Ciisaha Naasareet	36
Aamiin	37
Samooyinka	38
Fikirka Kitaabku Ka Qabo Khamriga Iyo Khamri Cabnimada	42
Halbeegyadii Cufka Iyo Culayska Ee Dadkii Hore Ee Bariga	
Dhexe (Metrology)	45
Kormaridda	48
Yooxanaa Adeegsigiisa Falka “Rumays” (Magacu Waa Dhif)	51
Sanhedriinka	55
Boqortooyada Ilaah	58
Neef, Dabayl, Ruux	60
Ilaah Oo Loo Tilmaamay Sida Aadanaha	63
Qadarka (Calvinism) Iyo Doonista Aadanaha (Arminianism)	64
Shaabad	72
Takoorka	77
Waxsii Sheegiddii Axdiga Hore	82
Wax Sii Sheegidda Axdiga Cusub	85
Aabbaha	87
Masiix	88
Doonista (Thelema) Ilaah	89
Bogsiintu Ma Qorshe Ilaah Da’ Kasta Ugu Talo Galay Baa?	97
Exegetical Procetures For Interpreting “Dembiga Aan Culayskiisa	
La Iska Rogi Karin”	100
Dirista (Apostellō)	101

Saacadda	102
Wacdintii Kaniisaddii Ugu Horraysay	105
Lacagtii Shilimaadka Ahayd Ee Falastiin Laga Isticmaali Jiray	
Xilligii Ciise	112
Tirada Labo Iyo Toban	113
Magacyada Rabbaaniga Ah	115
Hubsashada Masiixiga	121
“Runa” (Ujeedka) Ku Jira Qoraallada Yooxanaa	125
Weligii (Olam)	127
Ubixiddii Samada	129
Ruuxa (Pneuma) Ku Jira Axdiga Cusub	130
Apostasy (Aphistēmi)	131
Geesinimo (Parresia)	137
Jiniqabe (Ruux Aan Daahir Ahayn)	141
Baahnaanta Sii Socoshada	157
Gonostisiisamka	160
Erayga Giriiga Ah Falka Jumlada Loo Adeegsaday Badbaadada	168
Qirasho	170
Burbur (Apollumi)	177
Subkidda Ku Jirta Baybalka (Bdb 603)	186
Isugu Imaadka Baroordiiq	189
Dumarka Ku Jira Kitaabka Qudduuska Ah	191
Qaababkii Aaska	195
Mawduuc Gaar Ah: Sharka Shakhsi Ahaaneed.....	208
Dagaalka Jannada (Waxaa Laga Soo Qaaday Tafsiirkayga	
Ku Saabsan Muujintii)	210
Qalbiga.....	212
Adeegsiga “Amar” Ee Qoraallada Yooxanaa	214
Dalabka Adeegga Kormaridda Yuhuuddii	
Qarnigii Koobaad	218
Iskariyod	222
Xagay Jiraan Kuwii Dhintay?	229
Ducada Wax Ku Oolka Ah	234
Magaca Rabbiga	234
Masiixa Iyo Ruuxa	236
Adeegsiga Bawlos Ee Kosmos (Duni)	237
Maalintaas	238
Saddex Midnimada	240

Shaqsi Ahaanshaha Ruuxa	241
Masiixiga Iyo Nabadda	242
Dabka	249
Faahfaahinta	259
Doorasho	267
“Runta” Iyo Qoraallada Yooxanaa	268
Qudduus	271
Doorasho/ Qadarka Iyo Baahida Loo Qabo Isu Dheeli Tirka Fiqi Ahaaneed	279
Ciisaha Naasareet	280
Ilaalada Guriga Badhasaabka	285
Bontiyas Bilaatos	286
Dumarkii Ciise Raacay	297
Cadarrada Maydka	301
Muuqashooyinkii Ciise Ee Sarakicista Dabadeed	307
Calaamad	310
Yooxanaa 1 Oo La Barbadhigay 1 Yooxanaa 1	327
Koinonia	329
Masiixiyaddu Waa Iskaashi	329
“Ku Dhex Jirista” Ku Sugaan Yooxanaa Qoraalladiisa	340
Garo (Badanaa Iyadoo La Adeegsanayo Sharciga Kunoqoshadiisa)	343
Dawladda Aadanaha	344
Facan Iyo Faca Iman Doona	346
Kan Quduuska Ah	348
Erayada Axdiga Cusub Ee Loo Adeegsaday Soo Laabashada Masiixa	354
Xaqnimada	356
Cadaymaha Axdiga Cusub Ee Badbaadada Qofka	358
Quduusnaanta	362
Wiilka Ilaah	364
Tukashada Aan Xadaysnayn Balse Xadaysan	369
Masiixiyiintu Ma Is Xukumi Karaan?	373
Erayada Giriigga Ee “Tijaabinta”	374
Wacdinta Boobka	379
Ballan Qaad	387
Salaadda Dhexdhexaadinta Ah	389
Waa Maxay Denbiga U Ahaaday Dhimashadu?	392
Oday	399
Kaniisad (<i>Ekklesia</i>)	409

XARFAHA LASOO GAABSADAY EE LAGU DHEX ADEEGSADAY TAFSIIRKAN

AB	Anchor Bible Commentaries, ed. William Foxwell Albright iyo David Noel Freedman
ABD	Anchor Bible Dictionary (6 vols.), ed. David Noel Freedman
AKOT	Analytical Key to the Old Testament waxa qoray John Joseph Owens
ANET	Ancient Near Eastern Texts, James B. Pritchard
BDB	A Hebrew and English Lexicon ee Axdiga Cusub, oo uu qoray F. Brown, S. R. Driver iyo C. A. Briggs
BHS	Biblia Hebraica Stuttgartensia, GBS, 1997
IDB	The Interpreter's Dictionary of The Bible (4 vol), ed. George A. Butrick
ISBE	International Standard Bible Encyclopedia (5 vol.), ed. James Orr
JB	Jerusalem Bible
JPSOA	The Holy Scriptures According to the Masoretic Text: A New Translation (The Jewish Publication Society of America)
KB	The Hebrew and Aramaic Lexicon ee Axdiga Hore oo uu qoray Ludwig Koehler iyo Walter Baumgartner
LAM	The Holy Bible From Ancient Eastern Manuscripts (the Peshitta) oo uu qoray George M. Lamsa
LXX	Septuagint (Greek-English) waxaana leh Zondervan, 1970
MOF	Tarjumaadda Cusub ee Kitaabka Quduuska ah, waxaana leh James Moffatt
MT	Masoretic Hebrew Text
NAB	New American Bible Text
NASB	New American Standard Bible
NEB	New English Bible
NET	NET Bible: New English Translation
NIDOTTE	New International Dictionary of Old Testament Theology and Exegesis (5 vols.), ed. Willem A. VanGemeren
NRSV	New Revised Standard Bible
NTV	New International Version
NJB	New Jerusalem Bible

OTPG	Old Testament Parsing Guide by Todd S. Beall, William A. Banks iyo Colin Smith
REB	Revised English Bible
RSV	Revised Standard Version
SEPT	The Septauging (Greek-English) waxaana leh Zondervan, 1970
TEV	Today's English Version from United Bible Societies
YLT	Young's Literal Translation ee Kitaabka Quduuska ah, waxaana qoray Robert Young
ZPBE	Zondervan Pictorial Bible Encyclopedia (5 vols.), ed. Merrill C. Tenney

RAYADA QORAAGA SIDEE TAFSIIRKANI KUU CAAWIN KARAA?

Kitaabaka habka loo turjumo waa mid ku haboon xagga Ruuxa kn oo ah mid la fahmi karo waxaa jira qoraalo beryo hore la qoray. Sidaas aawadeed ayaa ayey fariniintani ilaahay uga timi si aan taan u fahana waa mid ku haboon xiligan xaadirka ah.

Haddaba habkan ruuxiga ah waa mid adag, oo ay adag tahay inaynu qeexno. Miyaanay ahayn inaynu u qayshano oo uu Rabbigu inoo furo tan. Waxaa waajiba inaan u gaajoono (1) Isaga (2) Inaan isaga garanayno iyo (3) Inaan Isaga u adeegno. Habkani waxa uu inoo jahaynayaa salaada, iyo qirasho si buuxdana ay nafteenu isku bedesho. Haddaba wax sahlan ma aha habka ruuxyada loo macnaynaayo, laakiin waa maxay daacadnimada, ay ka fahan san yihiin Kirstaanka aan Ilaah aaminsanayn inuu Kitaabku yahay mucjiso la fahmi karo. waa arrin caadiya hab ahaan in si fudud looga faaloodo tan. Waxa inagu waajiba inaan ku kalsoonaano oo aynaan ka cabsan qoraalada mana aha inay saamayn inagu samayso shiqsiyadeenu amaba hadhabta aan haysano inaan ku salayno. Inagu dhammaanteen waxa aan leenay taariikh . Ma jir mid inaga mid ah oo diidan, ama dhex dhexaad ka ah sida wax loo turjumo. Qoraaladani waxa ay inoo ogolaanayaan inaan si tacadar leh u eegno xaalada ahaan iyo hab ahaanba waxaana jira saddex ghab oo wax loo turjumo tiirar ahaan taasi waxa ay dhisaysaa ama inaga caawinaysaa sidii aan uga guulaysan lahayn waxa inaga inagu salaysan.

Qodobka Ugu Horeeya

Qodobka ugu horeeyaa waxa weeye inaan garanayno taariikh ahaan xiligii la qoray buugaas ka mid ahaa Kitaabka . iyo weliba meeshii khaaska ahayd taariikh ahaan ee qoraagu xiligaa wax ka qoray. Asal ahaan qoraagu waxa uu leeyahay ujeedo. Fariinta uu gudbinayaa. Qoraaladu inaga inoolama macno aha inaynu ula jeedno waxyaabihii asalka ahaa. Ee ay qoreen qoraayaashii xiligii hore, Isaga ujeedadiisu –ma aha inaga sheekadeena, dareenkeena, dhaqankeena iyo shiqsiyadeena ama waxyaabaha ay u baahan yihiin madhabteenu. –kani waa furaha. Qoraaladu waa inay ku salaysnaadaan wada shaqayn sida wax loo turjumayo. Laakiin turjumaadaha sax ahi waa inay had iyo goorba ay ku habaysan yihiin qoraalkeena. Sida waajibka ah waa inay xidhiidh leeyihiin mid walba oo ka mid ah Kitaabka inay qoraaladaasi isku mid yihiin oo ay leeyihiin hal macne . tani waxa ay la macna tahay wixii asal ahaan uu ka qoray Kitaabka qoraagaasi ee uu u muujiyey Ruuxu hogaamintu ee uu ula xidhiidhay isaga maalmihiisii. Tani waxaa laga yaabaa inay hal macne waxaana suuro gal ah inay jiraan kuwo faro badan oo ay suuro gal tahay qoraaladaasi inay ku kala duwan yihiin, dhaqanka iyo marxalada. Hadaba waxaa waajiba inay qoraaladaasi la xidhiidhaan udub dhexaadka runta ah asal ahaan wixii uu qoray qoraagu. Hadaba sababtaas daraadeed, wax barashadani waxa ay inagu hogaaminaysaa inay qoraaladu ay yihiin kuwo la qaabeeyey waxayna ina siinayaan horu dhaca mid walba oo ka mid ah buugaagta Kitaabka Quduuska ah.

Qodobka Labaad

Qodobka labaadna waa sidii loo cadayn lahaa qoraaladu waxa ay ka kooban yihiin. Mid walba oo ka mid ah buugaagta kitaabku waa qoraal hubaala. Kuwa turjumayaa awood uma laha inay ka jaraan hal arrin tan oo ah run oo qabka ah kuwan kale. Sidaas daraadeed, waxaa inagu waajiba inaan si cad u fahno ujeedada laga leeyahay guud ahaanba Kitaabka buugaagtiisa ka hor inta aynaan tujumaado ka bixiin si shiqsiyaada qoraalada qaybahooda. Sida qaybaha khaaska ah-Cutubada iyo sadarada , amaba aayadaha – tan ugalama jeedno waxa uu dhamaan cutubka macnihiisu yahay. Waxaa waajiba dhamaan turjumaadaha inay u socdaan hab sax ah ina eegahyna macnaha ay qabaha kale leeyihiin. Sidaas daraadeed, Wax barashadani waxa ay inagu hogaaminaysaa baadhitaanadu inay yihiin kuwo qaabaysan oo ka caawinaaya ardaydu sidii ay u aqoonsan lahaayeen baadhitaana ugu samayn lahaayeen qaab dhismeedka mid walba oo ka mid ah qoraalada cutub iyo sadarba. Safarada iyo cutubada kala qaybintoodu maha loo muujiyey. Laakiin waxa ay inaga caawinayaan inaga sidii aan u aqoon san lahayn qaybaha.

Turjumaadaha waa isku mid sadar ahaan. –ma aha weedh , erayo, ama habka erayga – kuwani soo socdaa furaha qoraaga Kitaabku uu micne ahaan ula jeedo. Sadaradu waxa ay ku salaysan yihiin in lagu aqoonsado mawduuca. Inta badana kuwaas waxaa loogu yeedhaa qaybo ka mid ah mawduuca. Eray kasta, weedh, ama jumlad ba waxa ay la xidhiidhaan si kastaba oo ay tahay sidii aynu kuwan ugu aqoonsan lahayn. Waa ay xadidan

yihiin, kana weyn yihiin, sharaxaadahooda, a maba su, aalahooda. Furaha runta ah ee si quman wax loo sharxi karo waa in la raaca wixii uu asal ahaan qoray qoraagu iyada oo la fiirinaay sadarka ka sadar kuwan oo ku salaysan waxa ay qoraaladu leeyihiin cutubada kuwaas ayaa waxa ay ka dhigayaan Kitaabka buugiisa. Waxbarashadani waxa ay inagu sidii ay inoogu sahli lahayd una qaabayn lahayd inay ardayda ka caawiso marka ay is bar bar dhiga samaynaayan Ingiriisiga casriga ah turjumidiisa . hadaba turjumaadahaas waa la doortay sababta oo ah waxaa ka shaqeyey tujumayaal kala duwan xagga fekeradaha isla markaasna waxay xambaarsan yihiin aragtiyo kala duwan:

1. United Bible Society's Greek qoraadalani waxa ay u dhowan yihiin daabacaadii afraad (**UBS**) Qoraaladaasi waxa ay ahaayeen sadaro kuwaas oo ahaa qaar casriya oo ay qoreen culumo.
2. New King James Version (NKJV) waxa uu ahaa eray -ka eray qoraaladaas oo ay turjumaadahoodu ku salaysanaayeen Greek kuwaas oo gacanta lagu qoray sida dhaqanku ahaa qoraalkaasna sidaas lagu aqbalay. Kuwani waxa ay ahaayeen sadaro la qaybiyey aan kuwana kuwa kale la xidhiidhin turjumaadahoodu. Hadaba in badan inagama caawin doonaan ardayda inay arkaan ama aqoonsadaan mawduucyadan.
3. New Revision Standard Version (NRSV) waxa uu u cadaynayaa erayba –eray turjumaadihiisa. Tani waxa ay tahay hab kaas oo tilaamaya faraqa u dhexeeya labadan casiriga ah ee qoraaladan. Iyada oo aad u tahay mid aad faa,iido u leh sidii aan u aqoonsan lahayn qaybta.
4. Today English Version (TEV) Waxa weeye mid aad u la yaab leh oo ku haboon tujumaada oo lagu daabay United Bible Society. Tani waxa ay cadaynaysaa in Kitaabka sidaasi loo turjumay marka aan eegno Ingiriisiga casriga ah oo la akhriyi karo . amaba ka hadlaaya uu fahami karo macnaha qoraalada Greek. In badan, oo khaas ah sida Injiilada waxa loo qabyiyaa sadaro mark la eego ka akhinaaya halkii loo eegi lahaa qayb. Waxa jir hab cusub kaasna waa NVI. Ujeedooyinka laga leedahay turjumadaha , kuwami ma aha kuwo ina caawin kara. Waa arin xiiso leh inaan ogaano labadaba UBS iyo TEV inay yihiin kuwo si isku mid ah loo daabacay, ilaa iyo hadana sadaradu waa ay kala duwan yihiin.
5. Jerusalem Bible (JB) waxa weeye wax tar ah oo ku hoon oo lagu turjumay afka Franch Catholic . waxa weeye mid aad inooga caawinaaya marka aan bar bar dhino marka la fiiriyo sadarada kuwaas oo ka yimi fekradaha European ka.
6. Waxa la daabacay qoraaladan sannadii 1995 iyada oo ay ku habaysnaayeen New American Standard Bible (NASB). Kaas oo ahaa mid eray eray loo turjumay. Iyada oo ay ahaayeen aayada aayad sida loo turjumayo sadaradan.

Qodobka Saddexaad

Qodobka saddexaad waxa weeye akhinta Kitaabka iyo turjumaadaha kala duwan si aynu ugu dhegno sida u ugu balaadhna ee suuro galka ah ee aan u helayno micnaha (luqad jirta oo hore) Taas oo laga helaayo erayada Kitaabka ama sadarada dhuqoodu leeyihiin. In ta badan erayga Greek waa la fahami karaa iyada oo siyaabo kala duwan loo fiirinaayo. Kala duwanaasha turjumaadahani waxa ay ina siinayaan fekerado iyo inay inaga caawiyaan inaan aqoonsano sharaxnana Greek qaybaha qoraalada. Kuwaas oo aan ka hor imanayn madhabta. Laakin waxa ay inaga caawinayaan inaga inaan isku dayno inaynu dib ugu laabano qoraaladii asalka ahaa ee ay qalin kooda ku qoreen wixii loo waxyooday qoraayada.

Haddaba fekeradahani waxa ay si deg dega inta badan jid u furayaan sidii ay ardaydu u eegi lahaayeen turjumaadaha. Tan ugalama jeedno inay inoo kala soocayaan, laakiin waxa ay ina siinayaan inaa helo fekerada –aynaan ku wareerin , badanaaba, waxa kale oo jira turjumaado ay suuro gal tahay kuwaas oo aan inaga caawinayn inay yihiin kuwo lagu kalsoonaan karo, wax tarna leh, hadhab ahaan. Tujumaadaha waxaa looga baahan yahay inay lahaadaan macno balaadhan oo isku durbo ridan marka aan eegno kala duwanaanshaha. Inaga oo fiirinayna inaa la ga shakiyin sidii ay ahaayeen qoraaladii hore. Tani waxa ay ina gelinaysa argagax sida ay halkaas in yar oo heshiisa laga helayo kuwa Masiixiyiinta ah kuwaas oo ku doodaaya inuu yahay Kitaabku isha runta.

Qodobadaas oo dhammi waa I caawinayaan inaga si aan uga guulayso in badan inaga sheekadaydii xaalada ahaan I qasbaysay inaan la dagaalamo wax ku saabsan qoraaladii hore. Waxa aan rajaynayaa inay taasi ku caawin doonto barakano ay kuu noqon doonto adiga.

Bob Utley
East Texas Baptist University
June 27, 1996

HOGAAMIINTA WANAAGSAN EE KITAABKA ARKHRINTIISA XAQIIQA RAADINTA SHAKHSI AHAANEED

Inagu miyaan awoodnaa inaan runta ogaano? Xaggee ayaynu se ka helaynaa? Miyeynu inagu si caqli gal ah cadanayn karaynaa tan? Misyeey se jirtaa waad cayimani oo ina xadaynaysa? Miyey se carqadalaahaasi ka hor imanayaan nolosheena, iyo caalamkaba? Kuwaasi se nolosheena macno ma u leeyihiin? Maxaynu inagu halakan u joognaa? Xaggee ayaynu se aadaynaa? Su,aalahaasi-Saalahaas waxa is weydiinayo oo dhan dadka waana ta ay ka fekerayaan. Bani-aadanku bilowgiiba waxa ay ahaayeen kuwo caqilileh marka alga soo bilaabo ilaa iyo xiligoodii. (Wacdiyaha 1:13-18; 3_9-11). Waxa aan xusuusan karaa marii anigu si khiqsi ah aan u sameeyey baadhitaan. Inay tani udub dhexaad u noqotay naftayda. Waxa aan noqday Mid rumaysad ku leh Masiixa markii aan yaraa-waxaana taa saas aas u ahaa calaamadihii markaati kicida oo kuwa kale oo ka mid ahaa qolyskaga. Haddba sidii aan u koray ee aan u noqonaayey qaar gaadh-su,ashan ayaan naftayda weydiinaayey, xitaa sida ay dunidu u korayso. Dhaqan fudud iyo waxyaabaha ay diinahu farayaan ilama siianyo macno marka aan eego waayo aragnimadaydii iyo waxyaabihii aan akhriyey kuwaas oo ku saabsanaa dareenkayga. Xiligaasi waxa uu ahaa xili aad wareersanaa, oo aan keli ahaan baadhitaan ku samaynaayey. Inta badana aan ahaa mid rajo la,aan ah wijigayguna waxa uu ahaa mid xaas xaasiya. Dunidan adage e aan ku noolahay.

Qaar ayaa waxa ay sheeganayaan inay su,aalahaas adag jawaab u ahayaan. Laakin marki aan sameeyey baadhitaan waxa aan helay inay jawaabahoodu ku salaysan yihiin isaga. (1) qof filosofiya (2) kuwii hore dhaqamadoodii (3) waayo aragnimda shiqsiyaadka. Maba (4)Maskax ahaan kuwa daalan. Dad faro badan waxa ay markaati ka yihiin kuwaas oo si jooto ah halkaas ugu noolaa inay bedeshay iyaga qoraalada kitaabku. Hadaba Masiixiyadu, waxa weeye hab cadaymeed rumaydka iyo aaminaada . ma leenahay awood taas oo aan kaga hadli karo su,aalaha aad ku u adag ee ay bani-aadanku is weydiinayaan noloshooda. Ma aha oo kleiia tani inay tahay tan ina siinaysa inaan lahaano qaab wada shaqayn. Laakiin waayo aragnimadu nooca aan u rumaysan nahay Kitaabka kaas ayaa inaga waxa uu ii keenay degenaansho iyo weliba farxad inaga dereenkagaygii.

Waxa aan ka fekeraayey inaan ahaa mid helay udub dhexaadka noloshayda –inuu yahay Masiixa. Sidii aan uga fahmay qoraalada waxa ay ii ahayd farxad. Iyo angia oo dareen aahaan muujiey wixii qalbigu dareemaayey. Hadaba si kastaba ha ahaatee, Ilaa iyo hada waxa aan xusuustaa argagax iyo xanuun markii ay qalbigayga ku soo dhaceen waxyaabo badan oo ku saabsan buugan iyo sidii loo turjumi lahaa iyo kala duwanaantooda . xilyada qaar ayaa Kaniisadaha kuwaas oo isku mid ah ayay xitaa culumadoodu fekeraan . Cadaymaha iyo muujintuba waa kuwo si xoogan loo rumaysan karo inuunu Kitaabku lahayn meel uu ku dhamaado. Laakiin uu yahay uu mid bilow ah . sidee ayaan u kala sooci karaa amba inta aan diido u cadaynayaa is ka hor imaadyada kuwaas oo ku saabsan kala duwaanshaha turjumaadaha iyada oo ay jiraan fariimo kala duwan oo qoraalada ka mid ah. Kuwaas oo ay qaar ku doodayaan inay leedahay xoog lehna in si buuxda loo rumaysto?

Hadaba shaqadan ayaa u noqotay noloshayda hadaf iyo weliba fursadii rumaysadkayga. Waxa aan oga inaan rumaysad ku qabay Ciise (1) wuxuuna is siiyey farxad weyn iyo nabad. Aniga naftayda waxaa ku jiray waxoogaa turunturooyina kuwaas oo xidhiidh la lahaa dhaqnkagii (shaqadayda Casriga ah) (2) ka koox ahan shaha iyo iska soo hor jeedida qaabka diimaha ee dunidan (Diiamha dunida), (3) isnacaybka madhabaha. Haddaba inaga baadhitaankaygii waxaa ku jiray daneeno kuwaas oo aan ku guul daraystay sidii aan u turjumi lahaa wax ku saabsan qoraaladii hore. Waxa aan aad ula yaabay markii aan shaaca ka qaday waxyaabo badan oo ku saabsan iniga taariikhdaydii iyo feradaydii. Taasna waxa aan u isticmaalay sidii hanti ianga oo qaybaha kale ku weeraray aniga oo cadaynaaya waxa aan anigu rumaysnahay iskuna qancinaaya. Sidee ayay taasi iigu xanuun badnayd markii aan aniga sidan dareemaayey!

In kasta oo aanan weligay diidin guud ahaanba. Waxa aan noqaday mid awooda inuu si wanaagsan u akhriyo Kitaabka. Waxa aan xadeeyey fekeradahaygii ku was oo aan ku cadaynaayey dadka kale waxa ay aqoon ahaan ka qabaan xiligaas markaas la joogay. Ilaa iyo hadana taas kama aanan madax banaanayn, laakin waxa aan ogsoonaa godolooyinka aan leeyahay. Kuwa turjumaanka ahi inta badan waxa ay yihiin cadowga ugu daran marka la eego inay akhriyaan Kitaabka!

Bal aan halkan idiinku tuso qaar ka mid ahaa waxyaabihii aan ka shakisnaa kuwaas oo igu ka liifay inaan bilaabo akhriska Kitaabka si aad adiguna u akhrido, waxaaba laga yaabaa inaad idiguna tan ila imtixaanto aniga.

I. Run kasoo qaadista

- A. Waxa aan rumaysnaa Kitaabku inuu yahay kan keliya ee la inoo muujiyey xagga muujinta nafta ka inoo miijinayna ee uu ka yimina uu yahay Ilaaha runta ah. Sidaas daraadeed, waxaa inagu waajiba inaan ku turjuno iftiinka iyo asal ahaan waxii ay cadeeyeen qoraagu (Waa Ruuxa) in kasta oo bani-aadanka wax qoraa ay leeyihiin sheekooyin kaas ah taariikh ahaan.
- B. Waxa aan rumaysnahay inuu qoray Kitaabka qof isku mid ah-dhaammaan dadkaas! Ilaahay ayaa waxa uu inoo cadeeyey inuu inaga inla hadlay si cad marka aan eegno wax ku saabsan taariikhihii iyo dhaqamada qoraaladoodii. Ilaahay runta ma qariyo-waxa uu doonayaa inaynu fahano! Sidaas daraadeed, waxaa inagu waajiba inaan sida iftiinka maalinta wax u sharaxno sida ay u iftiinto, maha sideena, Kitaabku kama wado inaga wax aan mano u lahayn kuwa aan weli akhriyay amaba aan maqlin. Waxa weeye wax ay fahmi karayaan marka la isku cel celiyo maskada bani-aadanka sida caadiga ah ee ay u isticmaalaan bani-aadanku xidhiidhka hab ahaan iyo xirfad ahaanba.
- C. Waxa aan rumaysnahay Kitaabku inuu cadaynaayo fariinta ujeedada uu ka leeyahay. Ma ha mid isagu is burinaya ama iska hor imanaya qudhisu. In kasta oo aanu ka koobnayn fariimo adag oo aan la fahmi karayn. Ka keliya ee sida wanaagsan Kitaabka u turjumaa waa isla Kitaabka qudhiisa.
- D. Waxa aan rumaysnahay mid walba oo ka mid ah fariimaha (xitaa marka lagu daro wax siisheegida). In ay tahay hal mid ayna leedahay hal fariin oo ay ku salaysan tahay iyada oo la fiirinaayo asal nimadeeda, iyo wixii loo muujiyey qoraaga. In kasta oo aynaan garanayn sida runtii ah sida xaqiiqada ah waxyaabo badan oo ay qoreen kuwii qorayaasha ahaa asal ahaan qoraaladoodii. Waxayaabo badan oo cadaymo ah ayaa halkan la inagu siinayaa.
 1. Nooca (nooca qoraalada) xulashada iyo soo jeedinta fariinta.
 2. Sheekooyinka iyo qaabkooda ama meelihii khaaska ahaa ee ay ka dhacday wax qoridu.
 3. Qoraalada iyo ciwaanada uu buugaasi ka koban yahay sida ugu wanaagsan mid walba qoraalka qaybihiisa.
 4. Qoraalada iyo isku dubaridooda (kormarida) iyo sida ay qoraaladu qayba ahaan u xidhiidhaan marka aan fiirino sida ay isula xidhiidhaan dhamaan fariimahani.
 5. Waxayabaha aas aasiga ah naxwaha mustaqbalka ku shaqaynaya ee ay kula xidhiidhayaan fariintooda.
 6. Erayada xiligaas la joogo lagu doortay fariinta
 7. Hadhxidhaalayaasha fariimaha.


Markii aan soo baranay mid walba gaara ahaan soo aragnay ayaan waxa ujeedada laga leeyahay inga wixii aan ka baranay fariinta. Ka hor inta aan anigu idiin sharxing sida wanaagsan ee loo akhriyo Kitaabka. Bal ii ogalaada inaan kor maro qar ka mid ah habkeena kaas oo maanta la isticmaalo. Taas oo in badan suuro ka dhigtayu habka tujaumaadaha iyada oo tan aan awoodi karo.

II. Qaababka aan haboonayn


- A. Hadii aan iska indho tiro waxa ay qoraladu leeyihiin ee Kitaabka oo aan isticmaalo mid walba oo ka mid ah sadaradiisa, qayb amaba erayo kaas ah sida odhaahtaa oo ah mid runa oo aan la xidhiidhin waxyaabihii uu qoray qoraagu aan u jeedadiisa ahayn.ama ay yihiin xoqaalo dhaadheer. Kuwan in ta badan waxaa loogu yeedhaa “Cadayn qoraalada”
- B. InAga oo iska indho tirayna taariikhda iyo habakeeda xiliyadaas oo buugaas la helay ka soo qaad kaasi inuu ka hadlaayo taariikh wax yarna uu ka sheegaayo amaba aanay jiran waxa taageeraaya qoraalkaas laxftiisa.
- C. Inga oo iska indho tirayna waxayaabaha taariikhiga ah ee buugaagtaas isla markaasna aan akhrino waxa ay ahayd maalin magaaladii uu ku dhasay lagu qoray wargeys. Kaas oo ka hadlaayey Masiixiyiinta casriga ah ee maanta.
- D. Inaga oo iska indho tirayna waxayabaha buugaas ku qoran qoraaladaas oo ah filosooyiyada iyo wax ku saabsan barashada Ilaah. Fariin taasi guud ahaanba lama xidhiidho kuwa mark hore maqla taasina ay tahay asal ahaan wax qayb ka ah wixii uu qoray qoraagu.

E. Inaga oo iska indho tirayna asal ahaan fariintii taas khusaysa sida mid hab uu leeyahay sida uu Ilaah u yaqaan, ama doorasho Mahdab ama. Qoraalo kuwaas oo loo isticmaalo sababo la xidhiidha aawadeed asal ahaan ujeedadii uu lahaayeen qorayaashu si loo tijaabiyo faraiinta. Tani waa qaab inta badan ay raacayaan sida tilamaayo ,marka aad akhrinayso Kitaabka. Taasna waxa ay la micne tahay inaan abuur kuwa ka hadlaaya ee awooda u leh. kuwani inta badan waxa ay la xidhiidhaan sida aan inagu “marka aan akhrino u dareeno ” (Maxay-qoraaladu-aniga macne inoo leeyihiin turjumaadaha).

Ugu yaraan waxaa jira saddex la xidhiidha shaxdan oo laga yaabao inaan ka holeo waxa kasta oo ay qoreen bani-aadanku ayna ku xidhiidheen.



Haddaba markii hore, waxa aan akhrinaynay kuwo kala duwan farsamo ahaan kuwaas oo ay ka halayeen saddexdii arrimood. Laakiin waxa runta ahi waxa ay tahay inay iska cadahay inuu Kitaabku yahay mid la muujiyey, waxana la inoogu cadaynayaa jaantuuskan kaas oo in badan la xidhiidha.



Sida runtii ah dhammaanba saddexdaas arrimoodba waxaa waajiba in ay ka mid yihiin habka wax loo turjumaayo. Iyada oo ay ujeedduna tahay sidii aan u cadayn lahayn. Aniga turjumaadahaygu waxa ay ku cabiran yihiin laba ugu horeeya tusaalayaashii: Asal ahaan wixii uu qoray qoraagu. Angu sida badan waxa aan gaadhy inaan iugu jwaabo aniga oo dhaleecaynaya wixii aan inagu hore baadhitaanka ugu sameeyey. (1) Iswaafajinta ama Ruuxiyanka iyo qoraalada (2) “mid qoraaya ayaa waxa uu ku jawaabay” turjumaadahan (maxay ainga macane ii leedahay). Inaan ku guulaysto talaabo kasta. Waxaa inag inagu waajiba inaan fiirino waxa ay ujeedooyinkeenu yihiin, ee ay ku salaysan yihiin, habka ahaan iyo qoraalada. Laakiin sidee ayaan u fiirin karaa iayga hadii aanay lahayn wax xuduuda inaga turjumaadaheenu, malaha xad, malaha wax u khaas a? Tani waxa weeye hala ay awoodu ka imayso ujeedada qoraalada qaabka u u dhisan yihiin ayaa inaga waxa ay I siinayaan waxoogaa haba kuwaas oo aniga I xadaynaaya sida aan u turjumi laha hadii ay suuro gal tahay turjuuadii dhacday.

Waxaa jira waxyaabo inoo ifiynaaya sida aan wax u sharaxnay marka aan eegno xirfadaheena. Maxay yihiin qaar ka mid waxa wanaagsan ee Kitaabka aan ka akhrino iyo sida ay tujumaaduhu ina tusayaan un badan cadaymaha iyo cawaaqibka.

III. Qaababka wanaagsan ee suurto galka loona akhrin karo Kitaabka

Haddaba marka aan tan eegno inagu ka ma hadlaayo habka midaysan taas oo loo turjumo qayba ha guud ahaan kuwa isku caynka ah iskuna tiirarka ah kuwaasi waxa ay yihiin dhamamaanba qaar aan laga helayn Kitaabka. Buugga wanaagsani waxa uu si khaas ah waxa ee ugu dhow waa. *How To Read the Bible For All Its Worthy*, by Gorden Fee and Dougl Stuart, aas oo ay daabaceen by Zondervan.

Aniga habkaygu waxa uu ku xooga saarayaa ujeedad akhriyaha marka uu u ogalaado Ruuxa Quduuska ahi kaas ayaa inoo cadaynaya Kitaabka runtiisa. Sida marka ay afar qof akhriyayaan si koox ah. Kan ayaa waxa uu samaynayaa Ruuxa , aas aaskana waxa la akhriyayaa qoraalada, ma aha waxa sare. Tani xitaa waxa ay ka caawinaysaa ka wax akhriyaaya in ta badan waxa ay saamayn ku yeelanaysaa ujeedadeena. Waxa aan malay iyada oo la leeyahay “Kitaanka waxaa laga saaray wax badan oo iftiina ujeedooyinkiisa” n “tan anigu ugala ma jeedno inaynu waxa ka bedelayno ujeedada taas oo ku saabsan sidii ay inooga caawin lahayd waxa barashadeena. Laakiin sidii aan u codsan lahayn xiliga ku quman sida aan iyaga u isticmaalayno.

Waxaa inagu waajiba inaan awoodno sidii aan u taageer lahayn inaga kuwa wax inoo turjuma gaar ahaan kuwaas ah qoraalada laftooda sida loo isticmaalo.

1. Asal ahaan wixii ay qoreen qorayaashu.
 - a-Dhacdiiyinka taariikhda
 - b-Qoraalada iyo juladahooda
2. Asal ahaan Qorayaashu doorashadoodii
 - a. Naxwa ahaan qaabka ay u dhisan yihiin (luqad)
 - b. Ujeedada shaqada laga leeyahay.
 - c. Nooca
3. Inagu qaabka aan u fahano
 - a. Muhiimada tusaalayaasha fariimaha

Waxa la inooga baahan yahay inaynu awoodno keenana sababo iyo feradaha caqli gala inay yihiin waxa aan turjumaynaa. Kitaabku waxa uu yahay isha keliya ee rumaysadkeena sidii aan ugu dhaqmi lahayn. Badanaaba, in ta badan Masiixiyiintu iskuma raacsana waxyaabaha kuwaas oo ah wax aan la baranayo ama ba waa ay ku kala duwan yihiin. Tani waxa ay tahay iyada oo ay naftoodu iska hor imanayaan marka laga hadlaayo muujinta waxa Kitaabka leeyahay. Markaas ka dib kuwa rumaysadka lihi ma awoodayaan inay tan isku raacaan waxa ay ina barayaan iyo waxa ay inaga codsanayaan!

Waxa jirta afar wax oo aan soo akhriyay kuwaas oo inaga siinaya arag ku saabsan turjumaadahan soo socda.

- A. Akhriska ugu horeeya ee wareega.
 1. Marka aad fariin keliyga ka akhrido buug. Mar labaad akhri adiga oo isticmaalaaya turjumaad kala duwan fekerad ahaan.
 - a. Eray-eray (NKJV, NABS NRSV)
 - b. Nooyada kala duwanaanshaha
 - c. Sadarada (Living Bible, Amplified Bible)
 2. Waxa aad eegtaa udub dhexaadka ujeedada marka la bilaabayo qoritaanka, iyada oo kuwaas lagu aqoonsanaayo
 3. La diiday (Haddii ay suuro gal tahay) Qyabaha qoraalada, Sida cutubka, sadarka, ama, weedha, taas oo si cad inoogu sheegysa udub dhexaadka ujeedooyinkooda.
 4. Aqoonsiga Qoraalada iyo noocooda.
 - a. Axdiga Hore
 - (1)Sheekada Cibraaniyada
 - (2) Cibraaniyada gabayadoodii (Xigmada iyo qoraalada, Sabuurrada)
 - (3) Gabaydii iyo wax sii sheegidii (ujeedada gabayada)
 - (4) Sharciga iyo furahiisa .
 - b. Axdiga Cusub.
 - (1) Ujeedooyinka (Injiilka sida Falimaha rasuullada)
 - (2) Tusaalayaasha (Injiilka).
 - (3) Waraaqihii
 - (4) apocalyptic-Qoraaladii

B. Akhriska labaad koox ahaan.

1. Waxa aan mar labaad akhriyey buug, inaga oo ka raadinaaya inaan aqoonsado qodobada muhiimka ah ama mawduuca.
 2. Marka aan fiirino inta badan kormarida ee aan si caadiya qoraada u tijaabino si fudud.
 3. Waxa aad fiirisaa ujeedada weydiinta iyo ciwaanka kor marida kuwaas ka baranayno caawinta.
- C. Marka saddexaad ee aan wax akhrinayno koox ahaan.
1. Waxa aad mar labaad akhridaa buuga aad hayso adiga oo ka raadinaayo sidii aad u aqoonsan lahayn sheekooyinka noocooda, inaga oo eegayna goobo kaash ah kuwaas oo uu ku qoran Kitaabka iyo buugaagtiisa.
 2. kor mar guud ku samee badanaa mowduucyada iyo waxyaalaha ay ka hadlayaan
 - a. Qoraaga
 - b. Maalinta
 - c. La helay
 - d. Ujeedada gaar ka ah ee loo qoray
 - e. Noocyada kala duwan ee dhaqamada kuwaas oo la xidhiidha ujeedadeeba aan wax u qornay
 - f. Tiradii iyo taariikhdiid dadka iyo dhacdooyinkoodii
 3. Marka aad fidiso adiga kor maridaada saddarada noocyada qaybaha ee buugaagta aan turjunay. Had iyo goor waxa aan ku aqoonsan karaa qoraalada iyo qaybahooda. Tan waxaa laga yaabaa inaan inay jiraan noocyo badan oo cutibo ahi ama sadaro ah. Tani waxa ay suuro gal kaaga dhigaysaa inaad raacdo wixii uu qoraagu asal ahaan qoray ee suuro galka ahaa iyo qaabayntii qoraalada.
 4. Waxa aad fiirisaa taariikhdaada iyo habkii loo isticmaalay wax barashada inay inaga caawiso.
- D. Akhriskii afraad ee kooxaha
1. Waxa aad akhridaa qoraalada iyo tiradooda kuwaas oo ka soo hor jeeda noocyo badan turjumaado ah.
 - a. eray-eray (NKJV, NASB, NRSV).
 - b. Awood buuxda oo isku mid ah. (TEV, JB)
 - c. Sadarada (Living Bible, Amplified Bible).
 2. waxa aad eegtaa waxa ay leeyiin qoraadu naxwe iyo dhismahiisa .
 - a. Inaan ku celino aaydaha Efesos 1:612, 13
 - b. Ku celinta naxwe ahaan iyo dhisida rooma 8:31
 - c. Dhismaha iyo kala duwanaantooda
 3. Waxa aad taxdaa kuwan soo socda.
 - a. Calaamadaha iyo qaybahooda
 - b. xiliyada aan caadiga ahayn
 - c. Muhiimada iyo dhismaha naxwaha.
 - d. erayada adage e khaas ka ah. Sida ficilada, iyo odhaayada.
 4. Adiga oo eegaaya kuwa ku haboon tusaalooyinka iyo fariimaha
 - a. Waxa aad fiirisaa cadaynayana fariimaha iyo wax barida adigu mawduucii aad soo isticmaashay.
 - (1) (habka barsahada Ilaah) buugaagtiisa
 - (2) Tirooyinka Kitaabka
 - (3) Caalamadaha
 - b. Waxa aad eegtaa qoraalada aad ku biirinayso mawduucaaga. Kuwo faro badan oo run ah waxa ay u taagan yihiin is famid la,aan ka imanaaya kuwo badan oo Dariiqooyinka ah sidii loo cadayn lahaa -qoraalada qaar ka Kitaabka ka mida ayay ka muransan yihiin. Kitaabka guud ahaan waala inoo muujiyey. Waxaana waajiba inaan dhamaystiro fariinta si ay fariinta iyo qoraaladu ay u noqdaan kuwo isku miisaaman marka aan eegno turjumaadaheeda.
 - c. Waxa aad fiirisaa tusaalayaasha kuwaas oo ku yaal hal buug , oo mid qoraa ahi qoray, isku noocna ah. Kitaabku waa waxa ugu wanagsan ee aan turjuno sababta oo ah waxaa tan qoray hal qoraa. Xagga Ruuxa.

5. Waxa aad isticmaashaa waxbarashada taas oo kaa caawinaysa adiga baadhi taankaaga marka aan eegno taariikhaha iyo meelihii ay ka dhaceen
 - a. Barashada Kitaabka
 - b. Buuga laga baadho Kitaabka , buugaagta gacanta, iyo qabka kale qorida loo isticmaalo.
 - c. Kitaabka iyo horu dhaciisa
 - d. Kitaabka iyo qoraaladiisa (marka arrintan eegno waxa aad ka baranaysaa, taas oo u ogolaanaysa wax ay bulshadu rumaysan yihiin, xiligii hore iyo xiliga la joogo, sidii loo caawin lahaa loona saxi lahaa qof ahaan wixii aad soo baratay).

IV. Dabaqida fasiraadda Baybalka

Haddaba marka aan tan eegno waxa aan dib ugu laabanaynaa qoraaladeena. Waxayna kugu qaadanaysaa waqti sidii aad u fahmi lahayd asal ahaan waxa ay qoraaladaasi leeyihiin hab ahaan. Iminka waxaa loo baahan yahay inaad naftaadu tan ku dhaqanto. Iyo dhaqankaaga. Waxa aan cadaynkaraa awooda uu Kitaabku leeyahay “inaan fahano waxa ay leeyihiin qoraala asalka ah ee uu qoraagu yidhi maamihiisa , inaguna aan ku dhaqmano maanta runtaas ”

Qoraalada waxaa waajiba inay raacdo turjumaadaha kuwaas oo ahaa wixii uu asal ahaan qoray qoraagu waa inay labaduba waqtigaas wixii suuro gal ahaa. Kuma salayn karo Kitaabka fariintiisa marka aan eegno maalmahaas aan inagu jooganay. Ilaa iyo inta aan ka ogaanayno waxa ay ina leedahay inaga maanta. Fariibta Kitaabka ulama jeedno waxa aan weligeed macno lahayn!

Waxa aad war bixinka bixinaynaa kormarida, eenaga oo eegayna sadarada habkisa (akhriska koox ahaan 3) tani ma tahay hogaamintaada

Qoraaladu waxaa waajiba in la sameeyo saddaradeeda habaysan, kani ma aha erayga habkiisa. Erayadu waxa ay la micno yihiin wax keliya oo ku saabsan qoraalada. Weedhuhu waxa ay leeyihiin macne keliya qoraaladaas iyaga ah, sadarku waxa uu leeyahay macne iyada oo la eegaayo qoraaladu waxa ay leeyihiin. Qofka keliya ee kaas oo ah mid loo waxyooday kaas oo ku hawlan turjumaadaha habkii uu u qoray asal ahaan qoraalada. Waxa keliya oo aan raacaynaa isaga hogaamintiisa iyada oo uu ka buuxsamaayo Ruuxa Quduuska ahi. Laakiin ka buuxsiga ma aha muujin. Haddii aan nidhaahno “tan waxaa yidhi Sayidka” waxaa inagu waajiba inaan ku tiirsanaano asal ahaan wixii uu qoray qoraagaasi macne ahaan. Qoraaladeenu waxaa waajiba inay la xidhiidhaan aasa taas waxa ay ina leedahay ujeedada guud ee dhammaan la qoray. Habka qoraalada ku salaysan yihiin qayb ahaan iyada oo uu sadarada hab ahaan marka aan fiirino sidii loo horu mariyey.

Looma baahna inaan u ogolaano arrimaheena maabta inaan ku turjuno Kitaabka! Kiabaabka qudhiisa aan u ogolaano inuu hadlo! Waxaa laga yaabaa inaan kaa codsano inaga oo sawir ka qaadanayna tiirarka ay qoraaladu leeyihiin. Kuwaas oo taageeraaya hadii ay dhacsan yihiin qoraaladaasi kuwaas oo taageeraaya tiirarkan. Sida runtii ah, xiliyo faro badan ayaa udubdhecaadkeena ay sidan ahaayeen “inaga” Tiirarkeena –ma aha udub dhexaadka tiirarkeena.

Inaga oo ku salaynayna Kitaabka. Waxaa aad u muhiima inaan xusuusano tan. (inaga oo aqbalayna wax sii sheegida). Hal mid oo leh hal macne kaas oo ahaa kuwo dhacay kaas oo inta badan ka mid ahaa qoraalada Kitaabka. Macnahani waxa uu la xidhiidhaa ujeedada asalka ah sidii uu ula jeeday qoraagu ee uu inoo cadeeyey. Dhibaatooyinkii xiligasi ay iyagu joogeen ayaa mihiisii. Kuwo faro badan waxaa suuro gal u ahaa in la qaybiyo qoraalada macnhooda tan ooh al macno ah lahayd. qoraaladaasi waxa ay ku salaysan yihiin kuwaas oo aan helay, baahiyahoodu waa inay la xidhiidhaan wixii uu asal ahaan qoray macne ahaan qoraagu.

V. Saamaynta Ruux ahaaneed ee fasiraadda

Marar hore ayaan waxa aan ka soo hadlay qoraalada iyo sida ay suuro gal u yihiin marka aan fiirino habka aan u turjuno qoraalada. Iminka waxa aad ii ogolaataan inaan ka hadlo waxyaabaha xagga Ruuxa ku saabsan ee turjumaadaha. Kuwan soo socda ayaa waxa ay ka fiirinaynaa shax taas oo inaga inaga caawinaysa.

- A. Waxaad weydiisataa inuu Ruuxu ku caawiyo (cf. 1 Korintos 1:26-2-16).
- B. Waxa aad u si khaas ah si dembiyaada loo cafiyo lagaagna nadiifiyo dembiyada aad garanayso (cf. 1 Yooxanaa 1:9).
- C. Waxa aad u tukataa wax weyn ee aad doonayso sidii aad u ogaan lahayd Ilaah. (cf. Sabuurka 19:7-14; 42:1 ff; 119:1ff).

- D. Waxa aad ku salaysaa arag cusub si deg dega qaab nololeedkaaga.
- E. Waxa aad ahaataa mid is hoosaysiia waxna baran kara

Aad ayay u adag tahay inaad ilaaliso isu dheeli tirka kaas oo u dhexeeya habka suuro galka ah ee Ruuxa iyo hogaamintiisa Ruuxa Quduuska ah. Kuwan soo socda ayaa aniga waxa ay iga caawinayaan inaan isu dheeli tiro labadan.

- A. Waxa aan ka soo qaadanay James Sire, *Scriptures Twisting* , pp. 17:18:

“Qirashadu waxa ay ka timaadaa Ilaahay dadkiisa ama aha waxa uu dooranaayo ruuxu. Hadaba ma jiro hogaamiye taas oo lagu kala soocaayo Masiixiyiinta marka ay eegno Kitaabka. Lama kala saari karo ma na jiraan dad kuwaas oo xaq u leh inay si sax ah u turjumaan kuwaas oo ay waajib tahay inay inoo miyaadaan. ” Haddab sidaas daraadeed, marka uu ruuxa quduuska ahi siinaayo hadyad khaas ah amaba xigmad waxa aan eegaynaa aqoonta iyo waxa ay inoo tilaamayaan ruuxyadu. Calaamadan ma uu siinin oo keliya Masiixiyiinta inay noqadaan kuwa kale ee awooda u leh inay turjumaan Isaga eraygiisa. Tani waxa ay tahay in mid walba uu dadkiisa barto. Oo ay xukumaan ay eegaan isaga qoraaladiisa Kitaabka kuwaas oo u taagan kuwii uu Ilaahay siiyey awoodiisa xitaa kuwa uu isagu siiyey doorashada khaaska ah. Inay soo koobaan odhahaas waxa aan anigu samaynayaa inaan buugan ka soo saaro. Kitaabku miyuu yahay mid sax ah oo uu Ilaahay u muujiyey bani-aadankiisa oo dhan. Taasi waa inagu awood buuxda oo aan leenahay wax kasta oo ku saabsan waxyaabahan aan ka soo hadalay. Taasi guud ahaanba ma aha wax qarsoon laakiin kuwan si cad in loo fahmi karo. mid walba oo ka mid ah dadka caadiga ah dhaqan kasta oo ay haystaan”

- B. Keirkegaard, waxa uu helay in Bernard Ramm *Protestant Biblical enterparation*, p. 75:

Marka aan fiirino Keirkegaard naxwahiisa, iyo waxyaabihii aan ka soo baranay taariikhda Kitaabka. Waxa weeye mid ay suuro gal u tahay laakiin aas aas ahaan ah in si run ah loo akhriyo Kitaabka. “U akhri inuu Kitaabku yahay *Ilaahay eraygiisa*” Waxaa waajiba inuu mid waliba u akhriyo isaga qalbigiisa iyo weliba afkiisa. isaga oo isticmaalaaya maskaxdiisa aadna ugu baahan. Isla markaasna wadahalal la yeelanaaya Ilaahiisa. Haddaba haddii aad Kitaabka u akhrido si doqon nimo ah aan danayn ma aha oo keliya inay akhriyaan erayga Ilaahay kuwa aqoonyahanada ah. Sida uu mid u akhriinaayo sidii warqad jacal ah oo kale “ayaa mid kalena waxa uu akhriinayaa sidii erayga Ilaah”.

- C. H. H Rowley *the relevance of the Bible* p.19.

Ma mid badanaa si caqliyana u fahmi kara Kitaabka, si kastaba ha ahaatee waa aan dhamaynay. Ma awoodaan dhammaan habkan. Iskama indho tiri karo fahamida caynkan ah. Tani waxa ay tahay mid khaas ah inaan ka haysano fahan dhamaystiran. Laakiin waxaa waajiba inay inagu hogaamiso qananimda xagga Ruuxa buugan isaga ah hadii uu dhamaystirmo. Isla markaasna aan ka fahano xagga Ruuxa inuu kani ka weyn yahay wax kuwa caqliga leh si lagama maarmaana u toosinaaya. Arrimaha xagga ruuxiga cadaynkaraaya. Waxa ay u baahan yihiin ardayda marxalad ay ku helayaan ruuxa. Iyo oo si kulul u raadinaaya sidii ay Ilaah u heli lahaayeen isaga oo isagu qudhiisa u qayshanaaya, haddii uu isagu dhaafo wax ka sareeya baradashadiisa . iyo qani nimadiisa hoose kani waxa uu yahay buuga buugaagta ugu sareeya”

VI. Qaabka Tafsiirkan

The study guide commentary Waxa ay kuu qaabaynaysaa sidii ay kaaga caawin lahayd sidii aad u soo ban dhigi lahayd turjumaadahaaga sidan soo socota.

- A. Marka aan waxoogaa kor maro taariikhda waxa uu soo ban dhigayaa buug kastaaba. Ka dib marka aad dhamayso “*ee aad akhrido kooxda 3*” waxa aad hubisaa akhbaaraadkan
- B. Is waafajiin ayaa ifaysa ayaa laga heli lahaa halka uu ka bilaabmaayo mid kasta oo cutubada ka mid ah. Tani waxa ay kaa caawinaysaa inaad aragtol sida ay qoraadani qaybo u yihiin dhisitaankoodu.
- C. Bilowga mid kasta cutubadan badanaa qoraalada waxa ay leeyihiin qaybo sadaro kuwaas oo qaybinaaya qaoraaklda ina siinaaya turjumid kala duwan oo casri ah.
 - 1. The United Bible Society Greek qoraaladaas, waa daabacaadii afraad waxa ay u dhawran tahay (USB)

2. The New American Standard Bible 1995 dib loo habeeyey (NASB)
3. The New King James Version (NKJV)
4. The New Revised Standard Version (NRSV)
5. Today English version (TEV)
6. The Jerusalem Bible (JB)

Sadarada kala qaybsan ma aha qaar la waxyooday. Waa inay sida waajibka ah ay is waafaqsan yihiin qoraaladoodu. Marka la bar bar dhigaahyo turjumaadada casriga ah kuwaas oo ka imanaaya tujumaado kala duwan iyo fekarado ay leeyihiin kuwa ku xeesha dheer barshada Ilaahay. Imanaka waxa aan awoodnaa inaan baadhi taan kui samayno wax taageeraayan hab ahaan asal kii qoraaladii uu qoraagu ka fekaarayey. Mid kasta oo ka mid ah sadaradan waxa uu xambaar san yahay run aad u weyn. Tana waxa aynu ugu yeedhnaa “Maduuca weedha ama ” “udub dhexaadka farkarada qoraalada”. Kani waxa uu cadaynayaa fekerka furaha saxa ah ee sheekooyinka. Iyo naxwaha iyo sida loo turjumo. Mid ayaa waxaa laga yaabaa inaan weligii wax turjumin weligiina aan nu wax wacdiyin amaba barin wax ka yar hal sadar mooyee! Xitaa waxaa lagaaga baahan yahay sadar walba waxa uu la xidhiidhaa sadarada kale eek u wareegsan. Tani waa sababta ay sadaradu hab ahaan aynu u kor maro buug waliba bina muhiim u yahay. Waxaa iganu waajiba inaan raacno arrimaha kuwa suuro galka ah sida mawduuca kaas oo khuseeya asal ahaantii wixii loo muujiyey qoraaga.

- D. Bob Waxa uu inoo sheegay inuu raacaayey aayadaha- si aayada isaga oo ka taxadaraaya turjumaadaha. Tani waxa ay inagu hogaaminaysaa inaan raacno asal ahaan waxa uu ku fekaarayey qoraagu. Waxa kale oo aad ogaataa inaan ka helaynay akhbaaraadka meelo aad u kala duwan:
1. Maraxalada qoraalka
 2. Taariikhda, dhaqanka, muuqa shada gudaha.
 3. Naxwaha iyo akhbaaraadka.
 4. Barasahada erayga
 5. Muhiimada tusaalooyinka fariinta

- E. marka aan eegno waxyaabo kala duwan oo qoraadeenan ka mid ah, kuwaas waxa ay ku daabacan yihiin qoraal ahaan New American Standard Version (1995) dib u habayntii kuwani waxa ay qab ka ahaayeen tujumaano faro badan oo kala degisan kuwaas oo casri ah noocyo badana leh.
1. New King James Version (NKJV) kuwaas oo raacaaya qoraalka ay bani-aadanku qoreen. “Qoraalka la helay”
 2. The New Standard Version (NRSV) kaas oo ah eray ilaa - eray qoraalkaasina waxa uu ka yimi National council of churches the resaved Standard Version.
 3. Today English version (TEV) kaas oo ah layaab leh kuna baoon turjumaada lagan a soo turjumay American Bible Sociality.
 4. Jerusalem Bible (JB) kaas oo laga soo tujumay luaqada French Catholic kaas oo ahaa mid layaab badan kuna haboon turjumaada.
- F. Haddaba kuwa aan awoodin inay ku hadlaan luqada Greek marka aan bar bar dhigno turjumaada luqada Ingriisiga waxa inaga caawinaysaa sidii aan u fahmi lahayn waxa ay tahay dhibaatadu qoraaladeena.
1. Qoraadii hore
 2. Inaan eegno erayga macanihiisa
 3. Nax wuhu kuwa uu adag yahay qoraalada iyo habkooda
 4. Qoraaladii beenta ahaa.

In kasta oo aan luqada Igriiisiga turjumdiisa aanay xalinayn dhibaataada waxa ay u tahay halis meelaha aad ka u dhaadheer ee u baahan in badan laga fekre barashadooda

- G. Mid walba oo u dhow xidhiidhna la leh cutubka aya marka aan qaadanayno go,aanka su,aalaha ayaa waxa ay ina siinayaan inaan fiirino ujeedadeena muhiimada turjumaada eek u saabsan cutubkan.

HORDHACA YOOXANAA

FURITAANKA

- A. Matayos iyo Luukos waxa ay ku bilaabmayaan dhalashada Ciise Masiix, halka Markos uu kaga bilaabmayo baabtiiskii, laakiinse Yooxanaa waxa uu ku bilaabmayaa abuurka kahor.
- B. Yooxanaa waxa uu ka hadlayaa ilaahnimada dhammayska tiran ee Ciisihii reer Nasaret waana marka laga bilaabo aayadda ugu horraysa cutubka koobaad, sidoo kalena Injiilka dhexdiisa oo dhan waxa uu aad u adkaynayaa arrintaas iyada ah. Injiillada kale arrintan iyada ah way dedayaan ilaa lagasoo gaadho meelaha ay kaga hadlayaan (“Waxyaalaha Qarsoodiga ah ee Masiixa”).
- C. Yooxanaa isaga oo ka gaar ah Injiillada kale ayaa waxa uu isku dayayaa inuu Injiilka uu qoray waxyaabaha aasaaska u ah ka hadlo. Waxa uu isku dayayaa inuu kaniisaddii hore u fasiro noloshii iyo waxbaristii Ciise isaga oo markaasi tusinaya waxyaalaha asaasiga u ah arrintaas.
- D. Yooxanaa waxa uu soo jeedintiisa amaba hadalkiisu ku saabsan Ciise Masiix u qaybinayaa ilaa
1. Toddobo mucjiso iyo fasiraaddooda
 2. Toddobo iyo labatan waraysi amaba doodo lala yeeshay dad kala duwan
 3. Cibaadooyin gaara iyo maalmaha Ciidda
 - a. Maalinta Sabtida
 - b. Ciidda Kormarista (cutubyada 5-6)
 - c. Ciidda Waababka (cutubyada 7-10)
 - d. Ciidda Daahirinta Macbadka (10:22-39)
 4. Odhaahyada “Anigu”
 - a. Waxay la xidhiidhaa magaca Ilaahnimada (YHWH)
 - 1) Anigu waxaan ahay Isaga (4:26; 8:24, 28; 13:19; 18:5-6)
 - 2) Ibraahim hortiiis anaa ahaa (8:54-59)
 - b. Iyadoo ay lasocoto wax ku magacaabis
 - 1) Anigu waxaan ahay kibista nolosha (6:35, 41, 48, 51)
 - 2) Anigu waxaan ahay nuurka/iftiinka dunida (8:12)
 - 3) Anigu waxaan ahay illinka iduhu kasoo galaan (10:7, 9)
 - 4) Anigu waxaan ahay adhijirka wanaagsan (10:11, 14)
 - 5) Anigu waxaan ahay sarakicista iyo nolosha (11:25)
 - 6) Anigu waxaan ahay jidka, runta iyo nolosha (14:6)
 - 7) Anigu waxaan ahay geedka canabka ah oo runta ah (15:1, 5)
- E. Farqiga u dhexeeya Yooxanaa iyo Injiillada kale
1. Inkasta oo ay runtahay in ujeedada koobaad ee Yooxanaa ay ahayd fiqiga, haddana adeegsiyiisa xagga taariikh ahaaneed iyo xagga juquraafi ahaaneed, waxa ay yihiin kuwo aad sax u ah. Haddaba, sababta runta ah ee ka danbaysa farqiga u dhexeeya Yooxanaa iyo Injiillada kale waxa ay tahay mid aan si saxa loogu hubin.
 - a. Adeegyadii hore ee Yuhuudda (daahirinta Macbadka)
 - b. Taariikhda iyo usubuucii ugu danbeeyay ee noloshii Ciise
 - c. Ujeedada ugu badan ee xagga fiqiga
 2. Waxa fiican in wakhti lagu qaato kahadalka farqiga u dhexeeya Yooxanaa iyo Injiillada kale, sidaasi darteedna aan waxyaalo ku saabsan farqigaas kasoo xigto George Eldon Ladd kitaabkiisa *A Theology of the New Testament*.
 - a. “Injiilka Afraad waxa uu ka duwanyahay Injiillada kale, su’aasha la iswaydiin karaana waxa ay tahay haddii uu yahay mid si saxa usoo tebinaya waxbaristii Ciise iyo haddii uu yahay dhaqankii Masiixiyiinta iyo waxyaalihii la xidhiidhay xagga fiqiga” (p. 215).
 - b. “Xalka ka beensheegaya ka uugu dhow ee gacanta lagu hayo ayaa waxa uu yahay waxbaristii Ciise oo lagu sheegay erayada Yooxanaa. Haddii markaas kani yahay xalka saxda ah isla markaasna

gebagabadu ay tahay Afarta Injiil oo isugusoo biya shubanaya Yooxanaa, waxa imanaysa su'aal muhiim ah: heer intee leeg aya lagu qiyaasi karaa fiqiga Afarta Injiil ee isugusoo biyo shubanaya Yooxanaa iyadoo la door bidayo kaas Ciise? Heer intee leeg ayaa lagu qiyaasi karaa Yooxanaa oo doorbidaya fasiraadda hadalladii Ciise halka uu kasoo tebin lahaa waxyaalihii uu tooska u baray amaba u sheegay?" (p. 215).

- c. Ladd waxa kale oo uu W. F. Albright kasoo xiganayaa "Waxyaalaha laga helay Falastiin iyo Injiilka Yooxanaa" ee *The Background of the New Testament and Its Eschatology* oo ay leeyihiin W. D. Davies iyo D. Daube:

"Ma jiro farqi asal ah oo u dhexeeya injiilka uu qoray Yooxanaa iyo injiillada kale; farqiga u dhexeeyaana waxa uu ka been sheegayaa dhaqan gaara oo waxbaris ahaaneed isla markaasna ka mida waxbaristii Masiixa, gaar ahaan kuwa u eeg waxbarista is khilaafaysa.

Run ahaantii ma jirto waxyaalo tusin kara in waxbarista Ciise wax lagu daray amaba laga been abuurtay. Baahidii kaniisadii hore ayaa waxa ay saamaysay aayadaha akhrinta loo soo xulanayo ee Injiilka, laakiinse ma jirto sabab loo yidhaahdo kaniisaddii hore waxay ka masuul ahayd waxyaalo kasta oo la ogaaday isla markaasna la xidhiidha xagga muhiimadda fiqiga.

Waxyaalaha la sheego ee ugu cajiibka badan waxa ka mida culimada Axdiga Cusub kuwo ka mida oo sheega, in fikirka Ciise Masiix uu ahaa mid xadaysan, sidaasi darteedna farqiga u dhexeeya Yooxanaa iyo Injiillada kale waxa uu noqon karaa mid ku yimid fahanka fiqi ahaaneed ee Masiixiyiintii hore. Mufakir kasta oo wayn iyo shakhsiyad kastaaba waxa ay wax u fasiraan siyaabo kala gedisan, sidoo kalena mid kastaaba si ka kale ka gedisan ayuu dhegaystayaashiisa wax ugu sheegaa, isaga oo raacaya waxa la adeegsan karo marka loo eego wixii uu arkay amaba maqlay" (pp. 170-171).

- d. Markalana iyadoo aan kasoo xiganaya George E. Ladd:

"Farqiga u dhexeeya maaha Yooxanaa oo ahaa fiqi yaqaan halka kuwo kalena aanay ka aqoonin, laakiinse dhammaantood siyaabo kala duwan ayay fiqi yaqaan u ahaayeen. Taariikhda la fasiraa waxa laga yaabaa inay tahay mid ka xaqiiqo badan dhacdo taariikh ahaaneed. Haddii markaas Yooxanaa uu yahay mufasir fiqi yaqaan ah, waxa uu fasirayaa dhacdooyin uu hubay in taariikh ahaan ay dhaceen. Waxa aan caddayn ujeedada Injiillada oo bixin karta warbixinta *ipsissima verba* ee (eraydii Ciise ku hadlay) Ciise iyo haddii ay yihiin dhacdooyinkii dhacay wakhtigii noloshiisa. Waxa ay metalayaan oo la mid yihiin oo soo koobayaan waxbaristiisii. Matayos iyo Luukos waxa ay isku dayayaan inay ka madax bannaanaadaan Markos waxyaalaha uu ka qoray waxbaristii Ciise. Haddii haddaba, Yooxanaa oo adeegsaday xorriyad ka badan midda Matayos iyo Luukos, sababtu waxa weeyi isaga oo rabay inuu sawir dhammays tiran ka bixiyo Ciise Masiix iyo waxbarsistiisii" (pp. 221-222).

QORAAGA

- A. Injiilku magacaabi maayo cidda qortay laakiinse waxa uu tusinayaa inuu yahay qoraalkii Yooxanaa oo ahaa
1. Qoraa ahaa markhaati goob joog ah (19:35)
 2. Erayada ah "kii xerta ahaa oo Ciise jeclaa" (Polycrates iyo Irenaeus waxa ay ku tilmaamayaan inuu ahaa Rasuul Yooxanaa)
 3. Yooxanaa, kii ahaa ina Sebadi, weligiis laguma dhex magacaabin.
- B. Dhacdooyinka taariikh ahaaneed waxa muujinaya injiilka laftiisa, sidaasi darteedna muhiim maaha in qoraaga lagu dhex sheego, laakiinse waxa muhiim ah sheegitaanka waxa loo waxyooday qoraaga.
- Qoraanimada iyo taariikhda Injiilka Yooxanaa maaha mid saamaynaya waxyaalaha, laakiinse waxa ay saamaynaysaa fasiraadda. Mufasiriinta ayaa raadiya dhacdooyinka taariikh ahaaneed, iyo wakhtiga amaba waxa sababay in kitaabka la qoro. Waxa markaa qofku is barbar dhigi karaa wixii Yooxanaa ku ilhaamiyay arrintan inay noqon karaan
1. Labadii casri ee Yuhuudda
 2. Macallinkii Qumran ee xaqnimada
 3. Diintii Zoroastrain ka
 4. Fikirki Gnostic ga.

5. Qaabkii Ciise ee gaarka amaba goonida ahaa?
- C. Aragtidii dhaqan ahaaneed ee hore ayaa waxa ay tahay in Rasuul Yooxanaa, oo ahaa ina Sebadi uu ahaa qofkii ahaa markhaatiga goob jooga ah. Arrintan markaasi waa in la caddeeyo, maxaa yeelay ilaha dheeraadka ah ee qarnigii labaad ayaa waxa ay u muuqdaan inay kuwo kale la xidhiidhinayaan soo saarista Injiilka:
1. Rumaystayaashii la socday iyo odayaashii Efesos oo markii Rasuulku gaboobay ku dhiirri geliyay inuu qoro (Eusebius ayaa waxa uu kasoo xiganayaa Klemantigii Aleksandariya).
 2. Rasuulkii la socday, oo ahaa Andrew (the Muratorian Fragment, C.D. 180-200, reer Rooma).
- D. Kuwo ka mida culimada wakhtiyadan danbe ayaa iyaguna waxa ay u malaynayaan marka la eego qaabka Injiilka in la odhan karo waxa la qoray qarnigii koobaad (kahor C.D. 115) waxaana qoray:
1. Yooxanaa xertiisii (kuwii isaga xertiisa ahaa) kuwaasoo xusuusnaa waxbaristiisii (J. Weiss, B. Lightfoot, C. H. Dodd, O. Cullmann, R. A. Culpepper, C. K. Barrett)
 2. “Yooxanihii waynaa,” (mid ka mid ahaa hogaamiyayaashii Asia oo ahaa mid uu saameeyay fiqigii Rasuul Yooxanaa) iyadoo lagasoo dhiraandhirriyay qoraallo ka mida Papias oo fahankoodu adagyahay (C.D. 70-146) oo lagasoo xigtay Eusebius (C.D. 280-339)
- E. Cadaymaha Yooxanaa laftiisa isaga oo ah qoraaga asalka ah ee Injiilka
1. Caddaynta gudaha ah
 - a. Qoraagu waxa uu yaqaanay waxbarista Yuhuudda waxaanu la wadaagayay aragtidooda ay ka haysteen Axdiga Hore
 - b. Qoraagu waxa uu yaqaanay Falastiin iyo Yerusaleem xaaladdoodii ka horraysay 70 C.D.
 - c. Qoraagu waxa uu sheeganayaa inuu ahaa markhaati goob joog ah
 - 1) 1:14
 - 2) 19:35
 - 3) 21:24
 - d. Qoraagu waxa uu ahaa xubin ka mida rasuulladii, waxaanu ka muuqdaa:
 - 1) Faahfaahinta wakhtiga iyo goobta (habeenkii xukunka)
 - 2) faahfaahinta tirada (ashuunadii/jalxadihii biyaha 2:6 iyo kalluunkii 21:11)
 - 3) Faahfaahinta shakhsiyaadka
 - 4) Qoraagu waxa uu ogsoonaan faahfaahinta dhacdooyinka iyo sidii loola tacaalay
 - 5) Qoraagu waxa uu u muuqda isaga oo calaamaddiisu tahay “kii xerta ahaa Ciise jeclaa”
 - a) 13:23, 25
 - b) 19:26-27, 34-35
 - c) 20:2-5, 8
 - d) 21:7, 20-24
 - 6) Waxay u muuqataa inuu qoraagu ka mid ahaa kuwii ag joogay Butros
 - a) 13:24
 - b) 20:2
 - c) 21:7
 - 7) Magaca Yooxanihii ina Sebadi, marqudha kama muuqanayo Injiilka, taasina waxa ay tusinaysaa inuu ahaa xubin ka mida kooxdii rasuullada
 2. Cadaymaha dibadda ah
 - a. Injiilka loo yaqaano
 - 1) Irenaeus (C.D. 120-202) kaasi oo la xidhiidhay Polycarp, ayaa waxa uu yaqaanay Rasuul Yooxanaa (Eusebius *Historical Eccleasticus* 5:20:6-7) – “Yooxanaa oo ahaa xertii Sayidka daacadna u ahaa isaga oo laftiisuna Injiilka ku qoray Efesostii Aasiya” (*Haer*, 3:1:1, waxa lagasoo xigtay *Hist. Eccl.* 5:8:4).
 - 2) Klementigii Aleksandariya (C.D. 153-217) – “Yooxanaa oo ay la taliyeen saaxiibadiis iyadoo Ruuxuna u waxyooday, si uu u qoro Injiilka” (Eusebius’ *Historical Eccleasticus* 6:14:7)
 - 3) Justin Martyr (C.D. 110-165) oo ku sheegay kitaabkiisa *Dialogue with Typho* 81:4
 - 4) Tertullian (C.D. 145-220)
 - b. Yooxanaa qoraanimadiisa waxa sheegay markhaatiyaal hore

- 1) Polycarp (C.D. 70-156, waxaana diiwaan geliyay Irenaeus), oo wadaad ka ahaa Symrna (C.D 155)
- 2) Papias (C.D. 70-146 waxaana diiwaan gelinaya Anti-Marconite Prologue Rooma iyo Eusebius), oo ahaa wadaadkii Hierapolis tii Phrygia, waxaana la sheegay inuu ahaa mid ka mida xertii Rasuul Yooxanaa.

F. Ilaah loo adeegsaday ka shakinta qoraaga asalka ah

1. Xidhiidhka uu Injiilku la leeyahay asal ahaan qoraallada Gnostic ga.
2. Lifaaqitaanka muuqda ee cutubka 21
3. Ka duwanaansha taariikh ahaaneed ee Injiillada kale
4. Yooxanaa naftiisa kumuu tilmaami lahayn “kii xerta ahaa oo Ciise jeclaa”
5. Yooxanaa adeegsigiisa uu Ciise u adeegsanayo erayo kala duwan oo ka duwan injiillaada kale.

G. Haddii aan kasoo qaadno inuu ahaa Yooxanaa maxaa ku saabsan ninka ee aan kasoo qaadi karnaa?

1. Waxa uu kasoo qoray Efesos (Irenaeus ayaa waxa uu leeyahay “Injiilka waxa lagsoo qoray Efesus”)
2. Waxa uu qoray markii uu gaboobay (Irenaeus ayaa sheegaya inuu noolaa ilaa xukunkii Trajan, C.D. 98-117)

TAARIIKHDA

A. Haddii aan kasoo Rasuul Yooxanaa

1. Ka hor C.D. 70, oo ahayd markii Yerusaaalem uu baabiiyay Boqorkii Roomaanka ee Titus
 - a. Yooxanaa 5:2, “Waxaa Yerusaaalem jirtay, Albaabka Idaha agtiisa, war biyo ah oo af Cibraani lagu yidhaahda Beytesda oo leh shan balbaladood..”
 - b. Adeegsiga magacii hore ee ahaa “xer” oo soo noqnoqonaya isaga oo tusinaya kooxdii rasuullada
 - c. Waraaqaha ah qoraaladii Gnostic ga ee laga helay Badda Dhimatay oo tusinaya inay ka mid ahaayeen qoraaladii fiqiga ahaa ee qarnigii koobaad
 - d. Tilmaamitaanka burburkii Yerusaaalem iyo Macbadka 70 C.D.
 - e. W. F. Albright oo ah khabiir caana oo ku takhasusay taariikhaha dadkii hore ayaa Injiilkan taariikhdiisa waxa uu u celinayaa aakhirii 70 C.D amaba ilaa bilowgii 80 C.D.
2. Qarnigii koobaad kaddib
 - a. Fiqigii Yooxanaa ee la horumariyay
 - b. Dhacitaankii Yerusaaalem lama sheegin maxaa yeelay wuxuu soo arooray ku dhowaad labaatan sano ka hor.
 - c. Yooxanaa oo nooca qoraalka Gnostic ga adeegsanaya marka la eego erayada iyo sida uu wax u sheegayo.
 - d. Dhaqamadii hore ee kaniisadda
 - 1) Irenayaas
 - 2) Esabiyaas

B. Haddii aan kasoo qaadno “Yooxanihii waynaa” markaas taariikhdu waxa ay noqonaysaa horaamiyeedii badhtamaha qarnigii labaad. Aragtidani waxa ay ku bilaabantay Diyoniisiyaas oo diiday qoraanimada Rasuul Yooxanaa (sababo suugaaneed aawadood). Esabiyaas qoraanimada Rasuul Yooxanaa ee kitaabka Muujintii waxa uu ku diidayaa sababo fiqi ahaaneed oo sheegaya, inuu helay “Yooxanaa” kale isla markaasna uu ka helay wakhtiga iyo goobta saxda ah ee Papias (*Historical Eccleasticus* 3:39:5, 6), waxaanu diiwaan gelinayaa labo “Yooxanaa” (1) Rasuulkii iyo (2) kii waynaa.

CIDDA LOO QORAY

A. Asal ahaan waxa loo qoray kaniisadihii ku yaallay gobolladii Roomaanka ee Aasiyada Yar, gaar ahaan Efesos.

- B. Maadaama oo si qoto dheer uu u diiwaan gelinayo nolosha shakhsiyaddii Ciisihii reer Naasareet, waxa ay middani noqotay in Injiilkan ay xiiseeyaan kuwii aan Yuhuudda ahayn ee Helestiiniyiinta ahaa iyo kooxihii kale ee Gnostic ga ahaa.

UJEEDADA

- A. Injiilka laftiisa ayaa waxa uu sheegayaa ujeedada wacdintiisa, 20:30-31
1. Waxa loo qoray akhristayaasha Yuhuudda
 2. Waxa loo qoray kuwii akhristayaashii aan Yuhuudda ahayn
 3. Waxa loo qoray akhristayaashii Gnostic ga.
- B. Waxay u muuqataa inuu leeyahay dood is jiidhitaan ah
1. Isagoo kasoo horjeeda kuwii sheeganayay inay raacsan yihiin Yooxanaa Baabtiisaha
 2. Isagoo kasoo horjeeda macallimiintii beenta ahaa ee Gnostic ga ahaa (gaar ahaan Prologue); macallimiinta beenta ahaa ee Gnostic gu sidoo kale waxa ay ka muuqanayaan kitaabo ka mida Axdiga Cusub dhexdiisa.
 - a. Efesos
 - b. Kolosay
 - c. Waraaqaha ay ka midka ahaayeen (1 Timoteyos, Tiitos, 2 Timoteyos)
 - d. 1 Yooxanaa (1 Yooxanaha koobaad waxa suurto gala inuu ahaa waraaqda jaldiga ee Injiilka)
- C. Waxa suurto gal ah ujeedada aayadda 20:31 oo loo fahmo iyada oo dhiirri gelinaysa caqiidada wacdinta ah sababtoo ah sidii fal jooga ayaa loo tilmaamayaa badbaadada. Dhinacan marka laga eego Yooxanaa, isaga oo la mida Yacquub, waxa laga yaabaa inuu isu dheelli tirayo fiqiga Bawlos ee kooxo ka mida Aasiyada Yari ay ku dhaqmayeen (2 Butros 3:15-16). Waxa la yaab leh kaniisaddii hore oo Yooxanaa la magacaabaysa Efesos iyadoon Bawlosna la sheegaynin (F. F. Bruce kitaabkiisa *Peter, Stephen, James and John: Studies in Non-Pauline Christianity*, pp. 120-121).
- D. Epilogue(cutubka 21) ayaa waxa uu u muuqdaa inuu ka jawaabayaa su'aala gaara oo ku saabsan kaniisaddii ugu horraysay
1. Yooxanaa waxa diiwaan gelinayaa waxyaalo dheeraada marka loo eego Injiillada. Si kastaba ha ahaatee, waxa uu diiradda saarayaa ka dhex adeegitaanka Yuhuudda, gaar ahaan Yerusaaalem.
 2. Saddexda su'aalood ee lagu haqab tiray lifaaqa cutubka 21
 - a. Soo celintii Butros
 - b. Yooxanaa noloshiisii dheerayd
 - c. Soo laabashada danbe ee Ciise
- D. Dadka qaarkood waxa ay u arkaan in si kas ah Yooxanaa uu isaga indha tirayo oonu u diiwaan gelinayn amaba uga hadlayn waxyaalaha ku sugan cutubka 3 (baabtiiska) iyo cutubka 6 (cashada Rabbiga).

KORMARKA GUUD EE YOOXANAA

- A. Hordhac fiqi ahaaneed (1:1-18) iyo dardaraan toos ah (21)
- B. Toddobo calaamo amaba mucjiso oo ah intii Ciise uu shaqadiisa waday (2-12) iyo fasiraaddooda:
1. Xafladdii arooska oo biyihii uu u rogay khamro (2:1-11)
 2. Bogsiinta wiilkii sirkaalka (4:46-54)
 3. Bogsiinta curyaankii joogay War Beytesda ee Yerusaaalem (5:1-18)
 4. Cuntadii lasiiyay dadkii gaadhayay 5000 ee Galiili (6:1-15)
 5. Ku dul socoshada baddii Galiili (6:16-21)
 6. Bogsiinta ninkii ku dhashay indho la'anata ee Yerusaaalem dhexdeeda (9:1-41)
 7. Laasaros oo uu kusoo nooleeyay meeshii la odhan jiray Beytaniya (11:1-57)
- C. Waraysiyadii iyo wada hadalladii uu la yeeshay dadka kala duwan
1. Yooxanaa Baabtiisaha (1:19-34; 3:22-36)

2. Xertii
 - a. Andros iyo Butros (1:35-42)
 - b. Filibos iyo Nataana'el (1:43-51)
3. Nikodemos (3:1-21)
4. Naagtii reer Samaariya (4:1-45)
5. Yuhuuddii joogtay Yeruusaalem (5:10-47)
6. Dadkii badnaa ee joogay Galilee (6:22-66)
7. Butros iyo xertii (6:67-71)
8. Ciise walaalihiis (7:1-13)
9. Yuhuuddii joogtay Yeruusaalem (7:14-8:59; 10:1-42)
10. Xertu markii ay joogeen qolka (13:1-17:26)
11. Yuhuuddu markii ay xidheen iyo xukumitaankii (18:1-27)
12. Maxkamadayntii Roomaanka (18:28-19:16)
13. Wada sheekaysiyadii Sarakicista, (20:11-29)
 - a. Isagoo la hadlay Maryan
 - b. Isagoo la hadlay tobankii Xerta ahaa
 - c. Isaga oo la hadlay Toomas
14. La dardaarankii Butros, 21:1-25
15. (7:53-8:11, qisada naagtii sinaysatay asal ahaan kamay mid ahayn Injiilka Yooxanaa!)

D. Caabudaad gaar ah/ maalmihii ciidaha

1. Sabtiyadii (5:9; 7:22; 9:14; 19:31)
2. Ciidihii Kormarista (2:13; 6:4; 11:55; 18:28)
3. Ciiddii Waababka (cutubyada 8-9)
4. Ciidda daahirinta macbadka 10:22

E. Adeegsiga odhaahda ah “Anigu”

1. “Waxaan ahay Isaga” (4:26; 6:20; 8:24, 28, 54-59; 13:19; 18:5-6, 8)
2. “Waxaan ahay kibista nolosha” (6:35, 41, 48, 51)
3. “Waxaan ahay iftiinka/nuurka dunida” (8:12; 9:5)
4. “Waxaan ahay kadinka iduhu kasoo galaan” (10:7, 9)
5. “Waxaan ahay adhijirka wanaagsan” (10:11, 14)
6. “Waxaan ahay sarakicista iyo nolosha” (11:25)
7. “Waxaan ahay jidka, runta iyo nolosha” (14:6)
8. “Anigu waxaan ahay geedka canabka ah oo runta ah” (15:1, 5)

AKHRINTA TAXANAHA KOOBAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Kitaabka oo dhan waxa aad ku akhridaa hal kal fadhi, waxaanad lasoo baxdaa oo ereyadaada ku cabirtaa ujeedada gebi ahaanba kitaabku ka hadlyo

1. Ujeedada gebi ahaanba kitaabka
2. Qaabka qoraalkiisa (nooca)

AKHRINTA TAXANAHA LABAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Marlabaad kitaabka akhri waxaanad soo saartaa ujeedada muhiimka ah adigoo ku cabiraya hal jumalada.

1. Cinwaanka cutubka kowaad
2. Cinwaanka cutubka labaad
3. Cinwaanka cutubka saddexaad
4. Cinwaanka cutubka afraad
5. Iwm.

YOOXANAA 1

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Eraygii wuxuu noqday jidh	Erayga daa'imiska ah	Hordhaca	Erayga nolosha	Hordhac
1:1-5	1:1-5	1:1-5	1:1-5	1:1-18
	Markhaatiga Yooxanaa ee iftiinka runta ah			
1:6-13	1:6-13	1:6-9 1:10-13	1:6-9 1:10-13	
	Eraygii wuxuu noqday jidh			
1:14-18	1:14-18	1:14-18	1:14 1:15 1:16-18	
Markhaati furka Yooxanaa Baabtiisaha	Codkii baaddiyaha	Markhaati furka Yooxanaa	Fariintii Yooxanaa Baabtiisaha	Markhaatiga Yooxanaa
1:19-28	1:19-28	1:19-23 1:24-28	1:19 1:20 1:21a 1:21b 1:21c 1:22a 1:22b 1:23 1:24-25 1:26-27 1:28	1:19-28
Wanka Ilaah	Wanka Ilaah		Wanka Ilaah	
1:29-34	1:29-34	1:29-34	1:29-31 1:32-34	1:29-34
Xertii hore	Xertii Hore	Markhaatifurka Ciise ee xertii hore	Xertii hore ee Ciise	Xertii hore
1:35-42	1:35-42	1:35-42	1:35-36 1:37-38a	1:35-39

			1:38b	
			1:39	
			1:40-42a	1:40-42
			1:42b	
U yeedhitaankii Filibos Nataana'el	Filibos iyo Nataana'el		Ciise wuxuu u yeedhay Filibos iyo Nataana'el	
1:43-51	1:43-51	1:43-51	1:43-45	1:43-51
			1:46a	
			1:46b	
			1:47	
			1:48a	
			1:48b	
			1:49	
			1:50-51	

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-18

- A. Kormarka fiqi ahaaneed ee gabayga/heesaha Ilaah ammaanka ah/odhaahda rumaysadka
 1. Daa'im, waxyi, abuure, badbaadiye Masiix, aayadaha 1-5 (Ciise oo ah erayga)
 2. Markhaatiga sii sheegay Masiixa, aayadaha 6-9, 15 (Ciise oo ah iftiinka)
 3. Ciise shakhsiyaddiisa oo Ilaah muujinaysa, aayadaha 10-18 (Ciise oo ah Wiilka)
- B. Qaab dhismeedka fiqi ahaaneed ee aayadaha 1-18 iyo ujeeddada soo noqonaysa
 1. Ciise wuxuu hore ula jiray Ilaaha Aabaha ah (1a)
 2. Ciise wuxuu xidhiidh dhow la lahaa Ilaaha Aabaha ah (1b, 2, 18c)
 3. Ciise wuxuu Ilaah Aabaha ah la wadaaga ruuxa (1c, 18b).

4. Ilaaha Aabbaha ah wuxuu rabaa badbaadada iyo in carruurtiisa la noqdo (12-13)
 5. Ilaah wuxuu soo qaatay jidh bani aadan (9, 14)
 6. Muujinta, Ilaahnimada si dhammays tiran ayaa loo muujiyay waana la fahmay (18d)
- C. Asalka *logos*(eray) ee luqada Cibraaniga iyo Giriigga
1. Asalka Cibraaniga
 - a. Awoodda erayga lagu hadlay (Ishacyaah 55:11; Sabuurka 33:6; 107:20; 147:15, 18), ee Abuurka (Bilowgii 1:3, 6, 9, 11, 14, 20, 24, 26, 29) iyo barakada (Bilowgii 27:1ff; 49:1)
 - b. Maahmaahyadii 8:12-23 “xikmad” waxa lagu tilmaamay abuurkii Ilaah ee ugu horreeyay iyo adeega dhammaanba abuurka (Sabuurka 33:6 iyo *Wisdom of Solomon*, 9:9)
 - c. Targum ka (tarjumaadaha iyo tafsiirrada Aramaatiga) waxay cibaarada “Erayga Ilaah” ku bedelaysaa *logos* maxaa yeelay waa ay soo gaabinaysaa
 2. Asalka Giriigga ah
 - a. Heraclitus – dunidu way is bedelaysay; waxyiga iyo is beddel la’aanta *logos* waxa ay yihiin kuwo la isku xidhay
 - b. Plato – is beddel la’aanta *logos* wuxuu keenay dhirta iyo sheegitaanka xilliyada
 - c. Stoics – eraygu (*logos*) wuxuu ahaa “sababta dunida” amaba maamulaha, laakiin wuxuu ahaa qayb ka mida qofka
 - d. Philo – waxa ay *logos* ku tilmaamaysaa “Wadaad sare oo dadka Ilaah ku haga, ” amaba “biriijka/buundada u dhaxaysa aadanaha iyo Ilaah, ” amaba “cagaha ay dunida oo dhan iyo wax waliba ku socdaan” (*kosmocrater*)
- D. Asaaska nidaamka fiqi ahaaneed ee Gnostic gu horu mariyeen qarnigii labaad C.D
1. Waxyaalaha daa’imka ah ee ka dhexeeya Ruuxa iyo waxa la taaban karo
 2. Waxa la taaban karaa waa shar; Ruuxuna wuu wanaagsan yahay
 3. Nidaamka Gnostic gu wuxuu qiyaasayaa heerka malaa’igaha(*aeons*) u dhexeeya sarraynta, Ilaah wuxuu abuuray waxa yar ee la taaban karo. Kaasi waa Ilaaha amaba YHWH Axdiga Hore.
 4. Badbaadadu waxay ku timid
 - a. Cilmi qarsoon oo qofka u ogolaanaya inuu ku baaso heerarkan malaa’igaha oo ku taagan jidkooda ay Ilaah midka kula yihiin.
 - b. Jidh Ilaahi ah oo ku jira aadanaha oo dhan, mana aha kuwo ku baraarugsan arrintan ilaa ay ka helaan qarsoodiga.
 - c. Adeege shakhsi ahaaneed oo gaara muujina ah, kaasi oo bixiya qarsoodiga garashada aadanaha (Ruuxa Masiixa)
 5. Nidaamka fikireedkani waxa uu sheegayaa Ilaahnimada Ciise, laakiinse waxa uu diidayaa run ahaanshaha iyo fikradda ku meel gaadhnimada ah ee ku saabsan qaab nololeedkiisa!
- E. Dhacdooyinka taariikhiga ah
1. Aayadaha 1-18 waxa ay isku dayayaan inay isku xidhaan waxyaalaha ku salaysan erayga *logos* iyo sida uu adeegsigeedu yahay Cibraaniga iyo Giriigaba.
 2. Arrimaha khuseeya Gnostic tiiska ayaa waxay tahay mid si aada uga dhex muuqanaysa injiilka Yooxanaa. Waxa laga yaabaa Yooxanaha Kowaad inuu ahaa jaldi Injiilka. Nidaamka fiqi ahaaneed ee markaas loogu magac daray “Gnostiiska” ayaa waxa uu ahaa midaan qoraallada lagu aqoonin ilaa qarnigii labaad, laakiin bilowga Gnostic ga waxa laga helay Badda Dhimatay iyo Faylu.
 3. Injiillada kale (gaar ahaan Markos) waxa uu qarinyaa ilaahnimada Ciise (qarsoodiga Masiixa) ilaa Kalafari dabadiis, laakiin Yooxanaa waxa uu si caadi ah uga hadlayaa bani aadanimada iyo Ilaahnida dhammayska tiran ee Ciise (Wiilka Aadanaha, Yexesqeel 2:1 iyo Daanyeel 7:13) ee cutubka koowaad.
- F. Eeg Mawduuca gaarka ah: Yooxanaa 1 iyo I Yooxanaa oo la isku barbar dhigayo I Yooxanaa 1:1

BARASHADA ERAYADA AAYADAHA

NASB (UPDATED) TEXT 1:1-5

¹Bilowgii waxaa jiray Hadalka, Hadalkuna wuxuu la jiray Ilaah, Hadalkuna wuxuu ahaa Ilaah. ²Isagu Ilaah buu la jiray bilowgii. ³Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis. ⁴Isaga waxaa ku jirtay nolol, noloshuna waxay ahayd nuurka dadka. ⁵Nuurkuna wuxuu ka ifayaa gudcurka, gudcurkuna kama badin.

1:1 “Bilowgii” Waxa ay ka tarjumaysaa Bilowgii 1:1 waxaana sidoo kale lagu adeegsaday Yooxanaa 1:1 iyada oo ah meel loogu noqonaya qaab nololeedka Ilaahnimada. Waxa suurto gal ah in Yooxanaha Koobaad uu ahaa jaldiga Injiilka. Labaduba waxa ay la tacaalayaan Gnotiiska. Aayadaha 1-5 waxa ay tusinayaan Ilaahnimada Ciise iyo isaga oo jiray xitaa abuurka ka hor (1:15; 8:56-59; 16:28; 17:5; 2 Korintos 8:9; Filiboy 2:6-7; Kolosay 1:17; Cibraaniyada 1:3; 10:5-8).

Axdiga Cusub waxa lagu tilmaamay

1. Abuurka cusub, lagumana dhex darin leexashada (Bilowgii 3:15 lagu fuliyay aadanaha)
2. Hanashada cusub (Dhulkii Ballanqaadka)
3. Baxniinta cusub (waxsii sheegista la dhammays tiray)
4. Muusaha cusub (sharci dejiyaha)
5. Yashuucaha cusub (Cibraaniyada 4:8)
6. Mucjisada biyaha cusub (Cibraaniyada 3-4)
7. Manna da cusub (Yooxanaa 6)

Iyo kuwo kale oo badan oo gaar ahaan laga dhex heli karo Cibraaniyada

MAWDUUC GAAR AH: *ARCHĒ*

Erayga “dhul” waxa uu luqada Giriigga ku yahay *archē*, oo macnihiisu yahay “bilow” amaba “asalka” wax uu leeyahay

1. Amarkii bilowga abuurka (Yooxanaa 1:1; 1 Yooxanaa 1:1; Cibraaniyada 1:10)
2. Bilowgii injiilka (Markos 1:1; Filiboy 4:15; 2 Tesaloniika 2:13; Cibraaniyada 2:3)
3. Markhaatigii goobjoogga ahaa ee ugu horreeyay (Luukos 1:2)
4. Calamadihii bilowga (mucjisooyin, Yooxanaa 2:11)
5. Qaababkii bilowga (Cibraaniyada 5:12)
6. Damaanad qaadka bilowga oo lagu saleeyay xaqiiqada injiilka (Cibraaniyada 3:14)
7. Bilowgii, Kolosay 1:18; Muujintii 3:14

Waxay u timid iyadoo loo adeegsaday “maamul”

1. Xukuumadaha aadanaha
 - a. Luukos 12:11
 - b. Luukos 20:20
 - c. Rooma 13:3; Tiitos 3:1
2. Awoodaha malaa’igaha
 - a. Rooma 8:38
 - b. 1 Korintos 15:24
 - c. Efesos 1:21; 3:10; 6:12
 - d. Kolosay 1:16; 2:10, 15
 - e. Yuudas aayadda 6

Macallimiinta beenta ahi waxa ay isku xidhaan xukuumadaha dunida iyo ta samada. Waxa ay doonistooda hordhigaan Ilaah, malaa’igaha, xukuumadaha iyo hogaamiyayaasha kaniisadaha.

▣ **“waxa jiray”** kani waa fal aan buuxin (aayadaha 1, 2, 4, 10) oo diiradda saaraya fal jiray oo soconayay wakhtigii lasoo dhaafay. Waxa falkan loo adeegsaday si loo tusiyo erayga (logos) jiritaankiisii hore (8:57-58; 17:5, 24; 2 Korintos 8:9; Kolosay 1:17; Cibraaniyada 10:5-7). Waxa lagu kala saaray falka aayadaha 3, 6, iyo 14.

▣ **“Hadalka”** erayga Giriigga ah ee *logos* waxa lagu tilmaamay farriin, mana aha eray oo keliya. Macnaha ay halkan uugu jirtaa waxa weeyi cinwaanka Giriigtu u adeegsadeen “sababda duniada” iyo ta Cibraaniyadu u adeegsatay ee ah “Xikmad.” Haddaba, Yooxanaa eraygan waxa uu u adeegsanaya si uu u sheego erayga oo isugu jira shakhsi iyo farriin. Eeg macnaha guud ee C.

▣ **“la jiray Ilaah,”** “la” waxa lagu macnayn karaa “fool ka fool.” Waxa ay tusinaysaa wada joogitaan. Sidoo kale waxa ay tusinaysaa fikirka ilaahnimada iyo sawirka saddexda daa’imka ah (Eeg Mawduuca Gaarka ah: Saddexmidnimada 14:26). Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa in Ciise uu gaar ka yahay Aabbaha, laakiinse sidoo kale waxa uu mid la yahay Aabbaha.

▣ **“Hadalkuna wuxuu ahaa Ilaah.”** Falkani waa mid aan buuxin sida ku sugan aayadda la. ma jiro qodob (kaasi oo magacaabi jira fal sameeyaha, eeg F. F. Bruce, kitaabkiisa *Answers to Questions*, p. 66) la socda *theos*, laakiin *theos* ayaa la horraysiiyay marka la eego adeegsiga xoojinta ah ee Giriigga. Aayaddan iyo aayadda 18 waxa ay aad u xoojinayaan Ilaahnimada dhammayska tiran iyo jiritaankii hore ee erayga oo ah Logos (5:18; 8:58; 10:30; 14:9; 17:11; 20:28; Rooma 9:5; Cibraaniyada 1:8; 2 Butros 1:1). Ciise waxa uu ahaa Ilaah dhammays tiran iyo aadane dhammays tiran (1 Yooxanaa 4:1-3). Lama mid aha Ilaaha Aabbaha ah hase ahaatee waxa uu leeyahay Ilaahnimada Aabbaha oo kale.

Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa Ilaahnimada buuxda ee Ciisihii reer Naasareet, hase yeeshee waxa uu kala saarayaa shakhsiyaddiisa ka duwan tan Aabbaha. Ilaaha kelinimada ah waxa lagu dhex sheegay Yooxanaa 1:1; 5:18; 10:30, 34-38; 14:9-10; iyo 20:28, halka kala soocnaanshohooda lagaga sheegay Yooxanaa 1:2, 14, 18; 5:19-23; 8:28; 10:25, 29; 14:11, 12, 13, 16.

1:2 waxa ay la mid tahay aayadda 1 waxaanay marlabaad xoojinaysaa xaqiiqada muuqata ee Ciisihii dhashay ku dhowaad 6-5 C.H., iyo inuu weligiisba ahaa mid la jiray Aabbaha sidaasi darteedna uu yahay Ilaah.

1:3 “Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa,” eraygu amaba Logos waxa uu ahaa adeegaha Aabbaha ee xagga abuurka kuwa muuqda iyo kuwa aan muuqan labadaba (aayadda 10; 1 Korintos 8:6; Kolosay 1:16; Cibraaniyada 1:2). Waxa ay middani la mid tahay doorka ay xikmaddu ka qaadanaayo Sabuurka 33:6 iyo Maahmaayadii 8:12-23 (xagga Cibraaniyada “xikmad” waa magac dhedig ah).

▣ **“oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis”** tani waa diidmada waxbaristii beenta ahayd ee Gnostic ga ee ku saabsanaa waxyaalaha u dhexeeya sarraynta iyo waxa la taaban karo jiritaankooda (eeg Fahanka Macnaha guud D).

1:4 “Isaga waxaa ku jirtay nolol” Erayadani waxa ay xoojinayaan in “nolosha” lafteedu ay ka timid Wiilka, oo ah Hadalka. Yooxanaa waxa uu adeegsanayaa erayga, *Zoe*, si uu u tilmaamo sarakicista nolosha, nolosha weligeed ah, nolosha Ilaah (1:4; 3:15, 36; 4:14, 36; 5:24, 26, 29, 39, 40; 6:27, 33, 35, 40, 47, 48, 51, 53, 54, 63, 65, iwm). Erayga kale ee Giriigga ah ee “nolol” *bios*, waxa loo adeegsaday nolosha dhulka (1 Yooxanaa 2:16).

▣ **“noloshuna waxay ahayd nuurka dadka”** nuurku waa tusaale guud ahaaneed oo Yooxanaa u adeegsanayo xaqiiqada iyo cilmiga Ilaah (Yooxanaa 3:19; 8:12; 9:5; 12:46). Fiiro gaara u yeelo in noloshu ay aadanaha oo dhan u ahayd (waxa suurto gala oo loogu noqon karaa Sabuurka 36:5-9)! Sidoo kale nuurka iyo mugdigu waxay ahaayeen waxyaalo guud ahaan uga muuqanaya qoraallada laga helay Badda Dhimatay. Yooxanaa laftiisa ayaa naftiisa waxa uu ku sheegayaa erayo kala soocitaan ah.

1:5 “Nuurkuna wuxuu ka ifayaa gudcurka” falkan soconaysaa waxa macnihiisu yahay fal joogto ah. Ciise weligiisba hore ayuu u jiray, laakiinse hadda waxa uu isu muujiyay dunida (8:12; 9:5; 12:46). Axdiga Hore dhexdiisa isu muujinta jidh ahaaneed ee Ilaah waxa ay ahayd mid hadiyo goorba lagu muujin jiray malaa’igta Ilaah (Bilowgii 16:7-13; 22:11-15; 31:11, 13; 48:15-16; Baxniintii 3:2, 4; 13:21; 14:19; Xaakinnadii 2:1; 6:22-23; 13:3-22; Sekaryaah 3:1-2). Waxa kale oo la sheegaa in tani ay ahayd shaqsiyaddii hore ee erayga.

MAWDUUC GAAR AH: MALAGGA RABBIGA

Waxa muuqata in Ilaah naftiisa uu jidh ahaan isugu dhex muujiyay aadanaha marka aan eegno Axdiga Hore. Haddaba, su'aasha la waydiin karo caqiidada Saddexmidnimada ayaa waxa ay tahay, keebuu ahaa shakhsiga Saddexmidnimada ka midka ah ee doorkan sameeyay? Maadaama oo Ilaaha Aabbaha ah (YHWH) iyo Ruuxiisu ay yihiin kuwo aan isla xidhiidhin, ayaa waxa ay u muuqataa oo suurto gal ah, in muujintan Ilaah isku dhex muujiyay aadanuhu inay ahayd intii Masiixu aanu jidhka noqon ka hor.

Si loola tacaalo waxyaabaha adag ee qof kasoo waajihi kara doorka malaa'igaha ayaa waxyaabahan hoos ku xusani waxay yihiin kuwo tusaale ahaan loo raaci karo:

1. Malagga Rabbiga oo ah malag
 - a. Bilowgii 24:7,40
 - b. Baxniintii 23:20-23; 32:34
 - c. Tirintii 22:22
 - d. Xaakinnadii 5:23
 - e. 2 Samuu'eel 24:16
 - f. 1 Korintos 21:15-30
 - g. Sekaryaah 1:12-13
2. Malagga Rabbiga oo ah qof
 - a. Bilowgii 16:7-13; 18:1-19:1; 22:11-15; 31:11,13; 48:15-16
 - b. Baxniintii 3:2,4; 14:19 (13:21)
 - c. Xaakinnadii 2:15; 6:22-24; 13:3-23
 - d. Hoosheeca 12:3-4
 - e. Sekaryaah 3:1-5



NASB, NKJV	“gudcurkuna kama badin.”
NRSV	“gudcurka kamuu guulaysanin”
TEV	“gudcurku weligiis kamuu badinin”
NJB	“iyadoo weligeed aanu gudcurku ka awood waynaan”

Macnaha asal ahaaneed ee (*katalambanō*) waxa weeyi “fahan.” Sidaasi darteedna waxa loogala jeedi karaa (1) in la dhuuxo amaba la fahmo awooddiisa (Matayos 16:18) amaba (2) in si fiican loo fahmo. Waxa haddaba suurto gal ah in Yooxanaa uu labadanba adeegsaday. Injiilka Yooxanaa waxa uu caan ku yahay labo waxyaalood (tusaale ahaan, “dhalashada labaad” ama “ka dhalashada xagga sare” 3:33 iyo “ruuxa,” 3:8).

Falka ah (*katalambanō*) labo jeer oo keliya ayuu kusoo dhex aroorayaa qoraallada Yooxanaa (kusoo dhex arooritaanka 8:3, 4 maaha asal). Aayadda 1:5 oo ah inaanu gudcurka ka badin iyo 12:35 oo ah in gudcurku diido iftiinka (Ciise/injiilka) ka adkaanaya. Diidmada waxa ka dhalanaya wareer; ogolaanshaha ama soo dhowayntana waxa ka dhalanaya caabuditaan!

Manfred T. Brauch, ayaa kitaabkiisa *Abusing Scripture*, p. 35, waxa uu ku sifaynayaa xaaladda aadanaha

1. Hallowga, Luukos 15
2. Gudcurka, Yooxanaa 1:5
3. Necbaansho, Rooma 5:10
4. Faquuqitaan, Efesos 2:15-17
5. Cibaado la'aan, Rooma 1:18
6. Ka fogaanshaha nolosha Ilaah, Efesos 4:17-18
7. Soo koobitaanka ugu wanaagsan ee denbiga aadanaha waxa laga heli karaa Rooma 1:18-3:23

NASB (UPDATED) TEXT: 1:6-8

⁶Waxaa jiray nin xagga Ilaah laga soo diray, magiciisuna wuxuu ahaa Yooxanaa. ⁷Isagu wuxuu u yimid markhaati furid, inuu u marag furo nuurka, inay dhammaan xaggiisa ka wada rumaystaan. ⁸Isagu nuurka ma uu ahayn, laakiin wuxuu u yimid inuu nuurka u marag furo.

1:6-8 aayadahan iyo aayadda 15 waxa lagu sheegay markhaatigii Yooxanaa Baabtiisaha ee ku saabsanaa Ciise, waxaanu ahaa nebigii ugu danbeeyay Axdiga Hore. Waxa adag haddaba in aayadahan loo dejiyo qaab gabay ahaaneed, sidaasi darteedna waxa jirta dood ka dhex taagan culimada oo ah, haddii hordhacani uu ahaa qaab gabay iyo inkale.

Yooxanaa Baabtiisuhu waxa uu ahaa nebigii ugu danbeeyay Axdiga Hore (marka laga eego dhinaca farriintiisii). Waxa uu ahaa horseedihii lagusii sheegay Malaakii 3:1 iyo 4:5 (Yooxanaa 1:20-25). Rasuul Yooxanaa waxa laga yaabaa inuu aayadaha 6-8 usoo geliyay wax ku saabsan fahankii qaldanaa ee wakhtigii hore laga haytay Yooxanaa Baabtiisaha (Luukos 3:15; Falimaha Rasuullada 18:25; 19:3). Qoraalka Yooxanaa waxa uu qoraayada kale ee Injiilka kaga duwanaa isaga oo dhibaatan arkay.

Waxa xiiso leh iyada oo Ciise Masiix lagu tilmaamay inuu ahaa mid weligiisba hore u jiray, halka Yooxanaa lagaga sheegay inuu ahaa mid wakhti kooban gudihii isku muujiyay (dhacdo taariikh ahaaneed oo natiijo ka danbayso) waxa sidaas tusinaysa (aayadda 6). Ciise haddaba waxa uu ahaa midi weligiisba jiray.

1:7 “inay dhammaan xaggiisa ka wada rumaystaan.” Tani waa ujeedada muhiimka ah. Yooxanaa injiilkiisu isaga oo la mida injiillada kale, waxa uu yahay qaab wacdin ah. tani waa midda haddaba badbaadada dhammaanba kuwa rumaysta Masiixa, oo ah nuurka dunida (aayadda 12; Yooxanaa 3:16; 4:42; 20:31; 1 Timoteyos 2:4; Tiitos 2:11; 2 Butros 3:9; 1 Yooxanaa 2:1; 4:14).

1:7, 12 “rumays” falkan isaga ah Injiilka Yooxanaa waxa lagu dhex adeegsaday 78 jeer, sidoo kalena 24 jeer ayaa lagu dhex adeegsaday waraaqaha Yooxanaa. Waxa haddaba xiiso leh Yooxanaa oo weligiis aan adeegsanayn qaabka magaca ah. Rumaysku ugu horraynba maaha ujeedo gaara amaba caadifad, laakiin waa ka jawaaba bixin daacad ah. Eragan Giriigga ah waxa lagu tarjumay saddex eray oo ah Ingiriisi: believe, trust, and faith. Waxa ay markaasi la mid tahay “In lasoo dhaweeyo isaga” (aayadda 11), iyo “aqbalitaankiisa” (aayadda 12). Badbaadadu waxa ay tahay mid lacag la’aan loogu bixiyay nimcada Ilaah iyo shaqadii Masiixu dhammays tiray, laakiinse waa in la qaato oo la ogolaado. Badbaadadu waa axdi ku dhisan xidhiidh oo leh xorriyad iyo sidoo kale masuuliyad.

MAWDUUC GAARAH: RUMAYSAD (PISTIS [MAGAC], Pisteuō [FICIL], PISTOS [SIFO]

- A. Tani waa weer aad muhiim u ah kitaabka (Cibraaniyada 11:1, 6). waa mawduucii ugu horayntii Ciise wacdigiisa ku jirtay. (Markos 1:15) waxa jira ugu yaraan laba axdi oo cusub oo laysaga baahanyahay. Toobadkeen iyo rumaysad (1:15; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21).
- B. Waa Cilmiga erayada iyo is bedbedalkooda (etymology)
 - 1. Weedha “rumaysad” Axdiga hore waxay ka dhigantahay daacadnimo, aaminimo, ama lagu kalsoonaan karo waaana mid qeexaysa dabeecada Ilaah, maaha tad aka.S
 - 2. Waxa ay ka timi weedh cibraaniga ah (*emun, umunah*), taas oo la macno ah (hubaal). Rumaysadkaagu badbaadada waa ku waafaqid maskaxiyan ah (xaqiiq jirta) (go,aano) ka go,an, iyo hab nololeed niyad samaana (hab nololeed) iyo xidhiidh aas aasiya (soo dhoweyn qof).
- C. Isticimaalka Rumaysad Axdiga Hore

Waa in xooga la saaraa in aanu Ibraahin rumaysadkiisu ahayn mid ku xidhan Masiixa mustaqbalka laakiin balanqaadkii Ilaah ee ahaa in uu dhali doono cunug faracakiisa noqda (Bilowgii 12:2; 15:2-5;17:4-8; 18:14). Ibraahim isagoo ka jawaabaya balanqaadkaa ayuu Ilaah rumaystay. Walise waxa uu wali ku jiray shaki , xaqiiqatana waxa ay qaadatay 13 sanno in balanqaadkii rumoobo. Hayeeshee Ilaah waa aqbalay rumaysadkiisa aan kaamilka ahayn. Ilaah mqarkasta waa danaynayaa in uu la sii shaqeeyo binu aadanka cilaysan ee u jaawaaba Isaga balanqaadkiisana si rumaysad leh u rajeeya, xataa hadii rumaysakoodu u yar yahay sida iniin qarde (Matayos.17.20).
- D. Isticimaalka Rumaysad Axdiga Cusub

Weedha “rumayn” “believed” waxa ay ka timi eray Griig ah (*pisteuō*) taasi oo waliba loo turjumi karo “ Rumaysad” ama “ Aaminid” tusaale ahaan odhaada magaca ah marar badan lama adeegsan Injiilka, Yooxanaa ablse ereayga ficilka ah ayaa la isticimaaly Yooxanaa 2:23-25 waxa muuqatay shaki ku jira sida ay waxa uga goanyiin dadkii badnaa masiixa reer Naasereet Masiix ahan. Tusaale yaal kale oo wanagsan oo ku saabsan ereygan “rumayn” waxay ku taala Yooxanaa 8:31-59 iyo Falimaha Rasuullada 8:13; 18-24. Rumayska dhabta ah sida kitaabku sheegay way ka wayntahay jawaab kaliya. Waa in ay raacdaa hanaan geedi socod xernimo (Matayos 13:20-22; 31-32).
- E. Isticimaalka “rumaysad” xidhiidhiye ahaan.

1. *eis* waxa uu macnaheedu yahay “ku” hab dhismeedkan cajiibka ahi waxa uu xooga saarayaa inay masiixiyiintu rumaystaan Ciise.
 - a. Magaciisa (Yooxanaa 1:12; 2:23; 3:18; 1Yooxanaa 5:13).
 - b. Isaga (Yooxanaa 2:11, 3:15,18 4:39; 6:40; 7:5, 31,39,48; 8:30; 9:36; 10: 42; 11: 45,48; 17:37,42; Matayos 18:6; Falimaha Rasuullada 10:43 Filiboy 1:9; 1Butros 1:18).
 - c. Aniga (Yooxanaa 6:35; 7:38; 11:25,26; 12:44,46; 14:1.12; 16:9; 17:20).
 - d. Wiilka (Yooxanaa 3:36; 9:35; 1Yooxanaa 5:10).
 - e. Ciise (Yooxanaa 12:11; Falimaha Rasuullada 19:4 Galatiya 2:16).
 - f. Iftiinka (Yooxanaa 12:36).
 - g. Ilaah (Yooxanaa 14:1).
2. *en* macnaheedu waa gudaha sida Yooxanaa qoray 3:15; Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 5:14.
3. *epi* waxa ay ka dhigan tahay ama kuwa gudaha ku jira Matayos 27:42; Falimaha Rasuullada 9:42; 11:17; 16:31; 22:19; Rooma 4:5,24; 9:33; 10:11; 1 Timoteyos 1:16; 1 Butros 2:6.
4. Xaaladda aan lahayn meelaynta sida ku sugan Galatiya 3:6; Falimaha Rasuullada 18:8; 27:25; 1 Yooxanaa 3:23; 5:10.
5. *hoti* waxa ay la macno tahay “rumaysad ina” siiya waxa la rumaysto.
 - a. Ciise ka Quduuska keliya ee Ilaah (Yooxanaa 6:69)
 - b. Ciise waa aan ahay (Yooxanaa 8:24)
 - c. Ciise aabaha ayuu ku jiraa isaguna aabaha ayuu ku jiraa (Yooxanaa 10:38)
 - d. Ciise waa Masiix (Yooxanaa 11:27; 20: 31)
 - e. Ciise waa wiilka Ilaah (Yooxanaa 11:27; 20:31)
 - f. Ciise aabaha ayaa soo diray (Yooxanaa 11:42; 17:8,21).
 - g. Ciise waxa uu ka mid yahay aabaha (Yooxanaa 14:10-11)
 - h. Ciise Ilaah ayuu ka yimi (Yooxanaa 16:27, 30).
 - i. Ciise waxa uu isku cadeeyey magaca Axdiga ee “waan ahay” (Yooxanaa 8:24; 13:19)
 - j. Isaga ayaan la noolahay (Rooma 6:8)
 - k. Ciise waa dhintay waana sara kacay (1 Tesaloniika 4:14) .

1:8 Waxa suurto gal ah in Rasuul Yooxanaa waraaqaha dheeraadka ah ee uu qorayo kagana duwanyahay qoraayada kale ee injiilka, inay ahayd isaga oo aqoonsanaa dhibaataada kuwii raacsanaa Yooxanaa Baabtiisaha, iyaga oo aan aqbalin Ciise (Falimaha Rasuullada 18:25-19:7).

MAWDUUC GAAR AH: U MARKHAATI FURISTA CIISE

Magaca ah (*marturia*) iyo falka (*martureō*) “markhaati,” waxa ay yihiin erayo fure u ah Yooanaa. Waxa jiro kuwo badan oo Ciise markhaati u ah:

1. Yooxanaa Baabtiisaha (Yooxanaa 1:7,8,15; 3:26,28; 5:33)
2. Ciise laftiisa (Yooxanaa 3:11; 5:31; 8:13-14)
3. Naagtii reer Samaariya (Yooxanaa 4:39)
4. Ilaaha Aabbaha ah (Yooxanaa 5:32,34,37; 8:18; 1 Yooxanaa 5:9)
5. Qorniinka (Yooxanaa 5:39)
6. Dadkii joogay sarakicintii Lasaaros (Yooxanaa 12:17)
7. Ruuxa (Yooxanaa 15:26-27; 1 Yooxanaa 5:10,11)
8. Xertii (Yooxanaa 15:27; 19:35; 1 Yooxanaa 1:2; 4:14)
9. Qoraaga laftiisa (Yooxanaa 21:24)

NASB (UPDATED) TEXT: 1:9-13

⁹Kaasu wuxuu ahaa nuurka runta ah oo iftiimiya nin walba oo dunida yimaada. ¹⁰Wuxuu ku jiray dunida. dunidana waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo duniduna ma ay garanayn isaga. ¹¹Wuxuu u yimid kuwiisii, kuwiisiina ma ay aqbalin isaga. ¹²laakiin in alla intii aqbashay, wuxuu siiyey amar ay carruurtii Ilaah ku noqdaan, kuwaasu waa kuwii magiciisa rumaystay, ¹³Oo aan ka dhalan dhiigga, ama doonistii jidhka, ama dad doonistiis, laakihi waxay ka dhasheen Ilaah.

1:9 “nuurka runta ah” tani waa mid “runa” oo mana aha waxa kasoo horjeeda oo ah beenta. Waxa laga yaabaa arrintani inay markaasi la xidhiidhay dhammaanba waxbaristii beenta ahayd ee qarnigii hore. Middani waxa ay tahay sifo caan ku ah qoraallada Yooxanaa (3:35; 4:23, 37; 6:32; 7:28; 15:1; 17:3; 19:35 iyo 1 Yooxanaa 2:8; 5:20 iyo toban jeer oo lagu sheegay Muujintii). Eeg Mawduucyada Gaarka ah: Runta iyo Dunida 14:17. Ciise waa nuurka dunida (3:19; 8:12; 9:5; 12:46; 1 Yooxanaa 1:5, 7; 2:8, 9, 10). Masiixiyiinta waa inuu ka muuqdo nuurkiisa (Filiboy 2:15). Tani waa farqi muuqda oo u dhexeeya mugdiga runta ah ee la socda abuurka isla markaasna uu sababay leexashada

1. Aadanaha
2. Malaa’igaha

▣ **“oo dunida yimaada”** Yooxanaa ereyadan waxa uu u adeegsanayaa marwalba isaga oo tilmaamaya Ciise oo kasoo tegay, boqortooyadii ruuxiga ahayd, isaga oo soo galay boqortooyada jidhka ee wakhtiga (6:14; 9:39; 11:27; 12:46; 16:28). Aayaddani waxa ay u muuqataa inay tilmaamayso Ciise ilaah ahaanshanimadiisa. Haddaba, arrimahani waxa ay yihiin kuwo ka dhex muuqda marwalba qoraallada Yooxanaa (kor iyo hoosba).

▣

NASB “iftiimiya nin walba”
NKJV “siya iftiinka nin walba”
NRSV “iftiimiya cid kasta”
TEV “iftiimiya dadka oo dhan”
NJB “kaasoo iftiinka siya qofkasta”

Ereyadan waxa loo fahmi karaa labo siyaabood. Ugu horrayn, iyada oo laga soo qaadayo wax ku salaysan dhaqanka Giriigta, waxaanay tilmaamaysaa iftiinka muujinta ah ee ku jira gudaha shakhsi kasta. Middanina waa sida ay Kuwaakariyiintu u fasiraan aayaddan. Si kastaba ha ahaatee, fikirka noocan oo kale ahi maaha mid weligiis ka muuqanaya Yooxanaa. Waxa uu Yooxanaa, “iftiin” ku sheegayaa inuu muujinayo sharka aadanaha (3:19-21).

Marka labaad, waxa ay tibaaxi kartaa iyadoon muujinayn waxyiga dabiiciga ah (in Ilaah dabiici ahaan lagu aqoonsan karo [Sabuurka 19:1-5; Rooma 1:19-20] amaba dareenka xagga gudaha qorka [Rooma 2:14-15]), laakiinse Ilaah uu iftiinka iyo badbaadada ku bixyo Ciise, kaasina waa iftiinka keliya ee runta ah.

1:10 “dunida” Yooxanaa erayga *kosmos* wuxuu u adeegsanayaa saddex siyaabood,

1. Dunidan caadiga ah (1:10, 11; 11:9; 16:21; 17:5, 24; 21:25)
2. Dhammaan aadanaha (1:10, 29; 3:16, 17; 4:42; 6:33; 12:19, 42; 18:29)
3. Aadanaha leexday ee ah kuwo u shaqaynaya si ka gaara Ilaah (7:7; 15:18-19; 1 Yooxanaa 2:15; 3:1, 13)

Macnahan marka aan eegnana waxa ay noqon kartaa oo ugu habboona #2. Eeg Mawduuca Gaarka ah 14:17.

▣ **“oo duniduna ma ay garanayn isaga.”** Midkoodna Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayniba Ciise umuu aqoonsanin inuu yahay Masiixii la ballan qaaday. Erayga ah “garasho” waxa uu luqada Cibraaniyada tusinayaa xidhiidh dhow oo ka badan in wax xaqiiqo keliya lagu waafaqo (Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5).

MAWDUUC GAAR AH: GARASHO (badanaa tusaale ahaan loo adeegsanayo Sharciga Kunoqoshadiisa)

Erayga Cibraaniga ah ee “garasho” (BDB 393) waxa uu leeyahay macnoyaal dhowr ah.

1. In la fahmo khayrka iyo sharka – Bilowgii 3:22; Sharciga Kunoqoshadiisa 1:39; Ishacyaah 7:14-15; Yooxanaa 4:11
2. In wax lagu garto fahanka – Sharciga Kunoqoshadiisa 9:2,3,6; 18:21
3. In wax lagu garto khibrada – Sharciga Kunoqoshadiisa 3:19; 4:35; 8:2,3,5; 11:2; 20:20; 31:13; Yashuuca 23:14
4. In wax loo fiirsado – Sharciga Kunoqoshadiisa 4:39; 11:2; 29:16
5. In shakhsi ahaan loo wax loo ogaado
 - a. Shakhsi – Bilowgii 29:5; Baxniintii 1:8; Sharciga Kunoqoshadiisa 22:2; 33:9
 - b. Ilaah – Sharciga Kunoqoshadiisa 11:28; 13:2,6,13; 28:64; 29:26; 32:17

- c. YHWH – Sharciga Kunoqoshadiisa 4:35,39; 7:9; 29:6; Ishacyaah 1:3; 56:10-11
- d. Galmo – Bilowgii 4:1,17,25; 24:16; 38:26
- 6. Xirfad amaba cilimi la barto – Ishacyaah 29:11,12; Caamoos 5:16
- 7. Xikmad lahoow – Sharciga Kunoqoshadiisa 29:4; Maahmaahyadii 1:2; 4:1; Ishacyaah 29:24
- 8. Aqoontii Ilaah
 - a. Ee Muuse – Sharciga Kunoqoshadiisa 34:10
 - b. Ee Israa'iil – Sharciga Kunoqoshadiisa 31:21,27,29

1:11 “Wuxuu u yimid kuwiisii, kuwiisiina ma ay aqbalin isaga.” “kuwiisii” labo jeer ayaa lagu dhex adeegsaday aayadda 11. Ta hore naxwe ahaan waa jamac dhexdhexaada waxaanay tilmaamaysaa (1) dhammaanba abuurka amaba (2) juquraafi ahaan dhulkii Yahuudiya amaba Yeruusaalem. Ka labana waa iyada oo naxwe ahaan tilmaamaysa jamac gaar ah, waxaanay sheegaysaa dadka Yuhuudda ah.

1:12 “laakiin in alla intii aqbashay” Waxa middan loogala jeedaa aadanaha inta qaybta ka ah badbaadada (aayadda 16). Aadanuhu waa inay ka jawaab celiyaan nimcada Ilaah ugu deeqay ee uu ku siiyay Masiixa dartiis (3:16; Rooma 3:24; 4:4-5; 6:23; 10:9-13; Efesos 2:8-9). Waxa hubaal Ilaah inuu leeyahay awoodda oo dhan, hase ahaatee awooddiisa iyo kartidiisa waxa uu shuruud uga dhigay axdiga ku dhisan xidhiidhka ee uu la yeelanayo aadanaha. Aadanaha leexday waa inay towbad keenaan, oo rumaystaan, oo addeecan, kuna taagnaadaan rumaysad.

Fikirkan ah “aqbalitaan” fiqi ahaan waxa uu la mid yahay “qirasho,” taasi oo ah qirashada rumaysadka Masiixa (Matayos 10:32; Luukos 12:8; Yooxanaa 9:22; 12:42; 1 Timoteyos 6:12; 1 Yooxanaa 2:23; 4:15). Badbaadadu waa hadiyad loo baahanyahay in la aqbalo aqoonna loo lahaado.

Kuwa “aqbala” Ciise (1:2) waxay aqbalaan Aabbaha isaga soo diray (5:43; 13:20). Badbaadadu waa xidhiidh shaqsi ahaaneed oo lala yeesho Ilaaha isku muujiyay Saddexmidnimada.

▣ **“wuxuu siiyey amar”** eraygan Giriigga ah ee (*exousia*) waxa macnihiisu noqon karaa (1) awood sharci ah amaba (2) amar amaba xorriyad (5:27; 17:2; 19:10, 11). Aadanaha leexday waxa ay Ilaah Aabbaha ah ku aqoonsan karaan iyaga oo usoo mara Wiilka oo ah Ciise Masiix.

▣ **“ay carruurtii Ilaah ku noqdaan,”** Axdiga Cusub waxa uu adeegsanayaa tusaalayaal isku dhow isaga oo tilmaamaya Masiixiyadda: (1) Aabbaha; (2) Wiilka; (3) carruurta; (4) marlabaad dhashay; iyo (5) korsasho. Masiixiyaddu waxa ay ka tarjumaysaa qoys, mana aha wax lasoo saaro (tigidh lagu galayo janada, lagagana badbaadayo cadaabta). Rumaystayaashu waxa ay Masiixa ku haystaan inay noqdaan dadka Ilaah. Haddaba, carruurta waxa laga rabaa inay ka muuqato dabecadda Aabbaha sidii uu u sameeyay (aayadda 14; 3:16) Wiilku (Efesos 5:1; 1 Yooxanaa 2:29; 3:3). Maxaa haddaba denbiilayaasha magacyo layaab leh lagu tilmaamay (11:52; Rooma 8:14, 16, 21; 9:8; Filiboy 2:15; 1 Yooxanaa 3:1, 2, 10; 5:2; Hoosheeca 1:10 lagusoo xigtay Rooka 9:26; iyo 2 Korintos 6:18).

Waxa sidoo kale xiiso badan labada eray ee Giriigga loo adeegsado carruurta oo midkood (*huios*), loo adeegsaday Ciise, halka ka kalena (*teknonteka*) looga adeegsaday rumaystayaasha. Masiixiyiintu waa carruurta Ilaah, laakiinse lama mid aha Wiilka oo ah Ciise, maxaa yeelay isaga xidhiidhkiisu waxa uu yahay mid gaar ah.

Erayga “kaniisad” (*ekklēsia*) kama muuqanayso Markos, Luukos iyo Yooxanaa. Waxa ay adeegsanayaan tusaalayaal la caynad ah isla markaasna tilmaamaya is weheshiga uu dhex joogo Ruuxu.

▣ **“kuwaasu waa kuwii rumaystay,”** Waa fal wakhti xaadirka jooga oo macnihiisu yahay “kuwa rumaysadka kusii socda.” Asalka macnaha eraygan waxa uu tusinayaa macno asaas ah. luqadda Cibraaniga asal ahaan waxa lagu tilmaamay qofka xaaladdiisu sugantahay. Tusaale ahaanna waxa loo adeegsan karaa qof lagu tiirsan karo, dabacsan oo la iskuna hallayn karo. Dhiggiisa xagga Giriigga waxa luqada Ingiriisida loogu tarjumay (“faith,” “believe,” iyo “trust”). Rumaysadka kitaabiga ahi maaha wax aan iska samayn karno uun, laakiise waxa weeyi wax aan isku hallayn karno. Waa runsheegnimada Ilaah ee balse maaha teenna. Aadanaha leexday waa inay isku halleeyaan Ilaah runsheegnimadiisa, oo isku halleeyaan cidda uu jecelyahay. Ujeedadu maaha in si kale loo arko rumaysadka aadanaha, laakiinse waxa weeyi in la arko meesha uu ka imanayo rumaysadkaasi. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:7 iyo 2:23.

▣ **“magaciisa”** Axdiga Hore marka aan eegno, magaca shakhsigu waxa uu ahaa mid aad muhiim u ah. Waxa la rajayn jirya inuu ka tarjumayo qaabkooda amaba dabeecaddooda. Haddaba, in magaca la rumaystaa waxa ay ka dhigantahay in qofkaas la aqballo (2:23; 3:18; 20:31; 1 Yooxanaa 5:13). Eeg Mawduuca Gaarka ah: 15:16.

1:13

NASB, NKJV, NRSV **“Oo aan ka dhalan dhiigga, ama doonistii jidhka, ama dad doonistiis,”**
TEV **“carruurta Ilaah kumay noqonin waxyaalo kale, taasi oo ah inay ka dhasheen oo noqdeen carruurta aabbe aadana ah”**

NJB **“oo aan ku dhalan kuna imanin doonista jidhka amaba doonista aadanaha”**

Kuwo ka mid ahaa wadaaddadii kaniisadaha (Irenaeus, Origen, Tertullian, Ambrose, Jerome, Augustine) waxay u arkaan in aayaddani ay tilmaamayso Ciise (keli), laakiin kuwo ka mida caddaymaha Giriigga waxa ay tusinayaan jamac (jamac eraygan waxa laga heli karaa oo keliya Axdiga Cusub; UBS⁴ oo ku tiranaya “A”), kaasi oo macnihiisu yahay in aayaddan macneheedu uu tilmaamayo kuwa rumaysta Ciise (3:5; 1 Butros 1:3, 23), sidaasi darteedna, maaha cirqi amaha wax la xidhiidha doonista jidhka ee aadanaha (“dhiig”), laakiinse waxa ay yihiin kuwo ku kalsoon Ilaah doorashadiisa iyo Wiilkiisa (6:44, 65). Aayadaha 12 iyo 13 waxa ay soo bandhigayaan isu dheelli tirka axdiga u dhexeeya Ilaaha awoodda leh iyo aadanaha ka jawaab celintooda.

Falka Giriigga ah waxa loo adeegsaday weedhaha isaga oo xoojinaya. Waxa ay xoojinaysaa bilowga iyo doorka Ilaaha awoodda lihi ka qaadanayo dhalashada labaad (“laakiin waxay ka dhasheen Ilaah”) taasi oo ka qayb ah cibaarada ugu danbaysa, (6:44, 65).

NASB (UPDATED) TEXT: 1:14-18

¹⁴Hadalkuna jidh buu noqday, oo waa ina dhex joogay, oo waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka buuxa. ¹⁵Yooxanaa waa u marag furay isaga, wuxuuna ku qayliyey oo yidhi, Kanu waa kii aan idhi, Kan iga daba imanayaa waa iga horreeyey, waayo, hortay buu jiray. ¹⁶Dhammaanteen waxaynu buuxnaantiisa ka helnay nimco ka nimco. ¹⁷Waayo, sharciga waxaa loo soo dhiibay Muuse, laakiinse nimcada iyo runtu waxay ku yimaadeen Ciise Masiix. ¹⁸Ninna ma arkin Ilaah marnaba, Wiilka keliya oo laabta Aabbaha ku jira kaasaa inoo sheegay.

1:14 “Hadalkuna jidh buu noqday” Yooxanaa waxa uu weerar ku qaadayaa waxbarista beenta ah ee Gnostic ga, kuwaasi oo rabay inay Masiixiyadda kala mid dhigaan fikirkiisii jahliga ahaa ee Giriigga. Ciise waxa uu ahaa Ilaah runa iyo aadana runa (1 Yooxanaa 4:1-3) isaga oo buuxinayaa Cimaanu’eel kii la ballan qaaday (Ishacyaah 7:14). Ilaah waxa uu dhex yimid aadanaha leexday. Erayga “jidh” marka la eego Yooxanaa dhexdiisa weligeed laguma tilmaamayo dabeecadda denbiga sida ka muuqata qoraallada Bawlos oo kale.

MAWDUUC GAAR AH: JIDH (sax)

Waxay tilmaamaysaa xikmadda aadanaha marka la eego dunida (1 Korintos 1:20; 2:6,8; 3:18). Bawlos haddaba, eraygan ‘jidh’ (sax) siyaabo dhowra ayuu qoraalladiisa ugu isticmaalayaa:

1. jidhka aadanaha (Rooma 2:28; 1 Korintos 5:5; 7:28).
2. faraca aadanaha (aabbe-wiil. Rooma 1:3; 4:1; 1 Korintos 10:18)
3. gebi ahaanba aadanaha (1 Korintos 1:26,29)
4. xumaanta aadanaha maadaama oo ay danbaabeen Bilowgii 3(Rooma 6; 7:8)

▣ **“oo waa ina dhex joogay”** fahan ahaan waxa ay noqonaysaa “dhex degay.” Waxa ay lahayd asal Yuhuudi ah oo ahayd mid wakhti socotay iyo Waabka (Muujintii 7:15; 21:3). Kaddib intaas Yuhuuddu waxa ay middan ugu magac dareen “waktiga shahrul casalka” oo ah mid u dhexeeyay YHWH iyo Israa’iil. Waktigan ka hor Ilaah sidan oo kale uuguma soo dhowaan. Erayga Yuhuudiga ah ee gaarka u ah waxyiga daruurta ahaa ee waktigaas hagayay Israa’iil waxa uu ahaa *“Shekinah”* oo luqada Cibraaniga ku ah “dhex joogis.”

▣ **“waxaannu aragnay ammaantiisii,”** Axdiga Hore ammaantiisii (*kabod*) hadda waa la muujiyay. Middani waxa ay tilmaamaysaa (1) wax ku jira noloshaha Ciise is beddelkaas oo kale (markhaatiga rasuuliga ah, 2 Butros 1:16-17) amaba (2) fikirka ah YHWH oo hore aan muuqan jirin loona akirin jirin laakiin hadda la arkay oo si dhammays tiran loo aqoonsaday. Waxa ay tani la mid tahay sida loogu sheegay 1 Yooxanaa 1:1-4, kaasi oo sidoo kale xoojinaya aadananimada Ciise, isaga oo markaasna kasoo horjeeda waxyaalaha Gnostic gu sheegayeen ee ahaa xidhiidhka u dhexeeya ruuxa iyo waxa la taaban karo.

Axdiga Hore dhexdiisa badanaa erayga Cibraaniga ah ee “ammaan” (*kabod*, BDB 458) asal ahaan waxay ahayd eray ganacsi (kaasi oo lagu sheegi jiray qiyaasta miisaanka), fahan ahaana wuxuu ahaa “culays ahaanshaha.” Waxaana loogala jeeday culays lahaanshaha iyo qiimaha uu leeyahay waxaasi. Waxa eraygan markasta loo adeegsaday oo lagu tilmaamay ammaanta Ilaah (ugu horrayn Buur Siinay, halkaasoo *Shekinah* daruurtii ammaantu ay joogtay, Baxniintii 13:21-22; 24:17; Ishacyaah 4:5; 60:1-2). Isaga oo keliya ayaa wanaagsan oo sharafna leh. Way u fiicantahay aadanaha leexday inay arkaan (Baxniintii 33:17-23; Ishacyaah 6:5). Ilaah waxa si runa loogu garan karaa Ciise oo keliya (Yeremyaah 1:14; Matayos 17:2; Cibraaniyada 1:3; Yacquub 2:1).

Erayga “ammaan” waxa loo fahmi karaa siyaabo badan

1. Waxa ay la mid noqon kartaa “xaqnimada Ilaah”
2. Waxa ay tilmaami kartaa “quduusnidama” Ilaah
3. Waxa ay tilmaami kartaa ekaanshaha Ilaah ee laga abuuray aadanaha (Bilowgii 1:26-27; 5:1; 9:6), laakiinse markii danbe aadanuhu ku kharribeen caasinimada (Bilowgii 3:1-22).

Ugu horrayntii waxa loo adeegsaday joogitaanka YHWH markii uu dadkiisa la joogay (Baxniintii 16:7, 10; Laawiyiintii 9:23; Tirintii 14:10).

MAWDUUC GAAR AH: AMMAAN (*DOXA*)

Fikradda Kitaabka Quduuska ee “ammaantu” waa mid ay adag tahay in la qeexo. Ammaanta Masiixiyiintu waxa weeyi fahanka injiilka iyo inay Ilaah ammaanaan, balse maaha nafhooda (1:29-31; Yeremyaah 9:23-24).

Axdiga Hore dhexdiisa erayada caanka ah ee loo adeegsado “ammaanta” (*kabod*) waxay ahaayeen kuwo ganacsi oo la xidhiidhi jiray miisaanka. Oo miisaanka culayska leh ayaa ahaa wax qiimo badan. Waxa kaloo eraygan loo adeegsaday tilmaamitaanka sharafta Ilaah (Baxniintii 19:16-18; 24:17; Ishacyaah 60:1-2). Isaga oo keliya ayaa wanaagsan oo sharafna mudan. Wuxuu dhowraa oo tix geliyaa aadanahan xad gudbay (Baxniintii 33:17-23; Ishacyaah 6:5). Ilaahna waxa lagu aqoonsan karaa oo keliya Masiixa (Yeremyaah 1:14; Matayos 17:2; Cibraaniyada 1:3; Yacquub 2:1).

Erayga “ammaan” waxa laga yaabaa inuu:

1. la siinnaa karo “xaqnimada Ilaah” (aayadda 21);
2. waxa kaloo laga yaabaa inay tilmaamayso raalli ahaanshaha Ilaah (Yooxanaa 12:43);
3. Waxa iyana laga yaabaa inay tilmaamayso ekaanshaha Ilaah ee laga sameeyay aadanaha (Bilowgii 1:26-27; 5:1; 9:6), iyagoo markii danbana Ilaah caasiyay (Bilowgii 3:1-22), laakiinse haddana dib loogu badbaadiyay Masiixa (2 Korintos 3:18). Haddaba, eraygan waxa loo adeegsaday Axdiga Cusub dhexdiisa markuu Ilaah la joogay dadkiisa (Baxniintii 16:7,10; Laawiyiintii 9:23; Tirintii 14:10).

NASB, NKJV “**taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha**”

NRSV “**ammaanta u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha**”

TEV “**Ammaanta uu helay isaga oo ah Wiilka keliya ee Aabbaha**”

NJB “**Ammaanta la midka ah tan Wiilka keliya ee Aabbaha**”

Eraygan ah “keli” (*monogenēs*) waxa macnihiisu yahay “gaar,” “noociisu mid keliya yahay” (3:16, 18; 1 Yooxanaa 4:9, eeg F. F. Bruce, kitaabkiisa *Answers to Questions*, pp. 24-25). Tarjumaadda ah “madi” waxa ay ka muuqataa (Luukos 7:12; 8:42; 9:38; Cibraaniyada 11:17). Ujeedadu waxa ay tahay kelinimada iyo inuu yahay gaar isla markaasna aanu ku imanin galmada aadanuhu ku dhashaan oo kale.

▣ **“Aabbaha”** Axdiga Hore waxa uu sheegayaa tusaale dhowaansha ah oo ah in Ilaah lagu sheegay Aabbe.

1. Umadda reer Israa’iil waxa hadiyo goor lagu sheegay “wiilasha” YHWH (Hoosheeca 11:1; Malaakii 3:17)

2. Xitaa bilowga Sharciga Kunoqoshadiisa Ilaah aabbe ayaa lagu tilmaamay (1:31)
3. Sharciga Kunoqoshadiisa 32 Israa'iliyiinta waxa loogu yeedhay “carruurtiisa” Ilaahna waxa loogu yeedhay “aabbihiin”
4. Waxa kaloo sidaa la mid ah Sabuurka 103:13 iyadoo sidoo kalena lagu horumariyay Sabuurka 68:5 (Aabbaha agoomaha).
5. Waxa ay arin guud ku dhex ahayd nebiyada (Ishacyaah 1:2; 63:8; Israa'iil oo wiil ah, Ilaah oo Aabbe ah, 63:16; 64:8; Yeremyaah 3:4, 19; 31:9). Ciise waxa uu qaadanayaa mid sidaasi la mid ah oo qoto dheer isla markaasna tusinaysa xidhiidh aad u sokeeya gaar ahaa Yooxanaa 1:14, 18; 2:16; 3:35; 4:21, 23; 5:17, 18, 19, 20, 21, 22, 23, 26, 36, 37, 43, 45; 6:27, 32, 37, 44, 45, 46, 57; 8:16, 19, 27, 28, 38, 42, 49, 54; 10:15, 17, 18, 25, 29, 30, 32, 36, 37, 38; 11:41; 12:26, 27, 28, 49, 50; 13:1; 14:2, 6, 7, 8, 9, 10, 11, 12, 13, 16, 20, 21, 23, 24, 26, 28, 31; 15:1, 8, 9, 10, 15, 16, 23, 24, 26; 16:3, 10, 15, 17, 23, 25, 26, 27, 28, 32; 17:1, 5, 11, 21, 24, 25; 18:11; 20:17, 21!

▣ **“nimco iyo run ka buuxa.”** Labadan waxyaalood waxa ay la socdaan oo ay yihiin kuwo lagu adeegsaday Axdiga Hore dhexdiisa *hesed* (axdiga jacaylka iyo daacadnimada) iyo *emeth* (runsheegnimo leh) waxaana lagu dhex adeegsaday Baxniintii 34:6; Nexemyaah 9:17; Sabuurka 103:8, labada eraybana iyaga oo wada socda waxa ay kusoo aroorayaan Maahmaayadii 16:6. Middani waxa ay sheegaysaa dabeecadda Ciise (aayadda 17) iyagoo ah erayo kusoo dhex arooray Axdiga Hore. Eeg Mawduuca gaarka ah ee 6:55 iyo 17:3.

MAWDUUC GAAR AH: JACAYL NAXARIIS LEH (HESED)

Erayga waxa uu aad caan uga dhex yahay dadka Yuhuudda ah. BDB ayaa waxa uu u kala saarayaa (338-339).

- A. Waxa la adeegsaday iyadoo xidhiidh la leh aadanaha
 1. Naxariista la socota aadanaha (1 Samuu'eel 20:14; 2 Korintos 24:22)
 2. Naxariista ku waajahan dadka baahan (Miikaah 6:8)
 3. Jacaylka (Yeremyaah 2:2; Hoosheeca 6:4)
 4. Daymo u yeelashada (Ishacyaah 40:6)
- B. Waxa la adeegsaday iyadoo Ilaah xidhiidh la leh
 1. Axdiga daacadnimada iyo jacaylka
 - a. “ka badbaadinta cadowga iyo dhibaatooyinka” (Yeremyaah 31:3; Cesraa 27:28; 9:9)
 - b. “nolosha oo dhimashada laga ilaaliyo” (Ayuub 10:12; Sabuurka 86:13)
 - c. “dedejinta nolosha ruuxiga ah” (Sabuurka 119:41,76,88,124,149,150)
 - d. “ka badbaadinta denbiga” (Sabuurka 25:7; 51:3)
 - e. “dhawrista axdiyada” (2 Korintos 6:14; Nexemyaah 1:5; 9:32)
 2. Wuxuu tilmaamaya tayada waxyiga Ilaahiga ah (Baxniintii 34:6; Miikaah 7:20)
 3. Naxariista Ilaah
 - a. “badnaanta” (Nexemyaah 9:17; Sabuurka 103:8)
 - b. “baaxaddeedu wayntahay” (Baxniintii 20:6; Sharciga Kunoqoshadiisa 5:10; 7:9)
 - c. “weligeed ah” (1 Taariikhdiisii 16:34,41; 2 Taariikhdiisii 5:13; 7:3,6; 20:21; Cesraa 3:11)
 4. Camallada naxariis lahaanshaha (2 Taariikhdiisii 6:42; Sabuurka 89:2; Ishacyaah 55:3; 63:7; Baroorashadii Yeremyaah 3:22)

MAWDUUC GAAR AH: AAMINIS, ISKU HALLAYN, RUMAYSAD, IYO RUMAYSAD YEELASHADA AXDIGA HORE DHEXDIISA (8)

I. Odhaahda Furitaanka

Waxa u baahan in la sheego adeegsiga fahankan fiqi ahaaneed oo Axdiga Cusub dhexdiisa aad muhiim uga ah, iyadoo sidaas oo kalena aan loogu dhex qeexin Axdiga Hore dhexdiisa. Waa hubaal oo waa lagu dhex sheegay, laakiinse badanaa waxay khusaysaa oo u gaartahay meelo gaara iyo shakhsiyaad mucayan ah. Axdiga Hore wuxuu isku dhex daryaa

1. Bulshada iyo shakhsiyaadka
2. Kulanka shakhsi ahaaneed iyo adeecitaanka axdiga

Rumaysadku haddaba wuxuu si gaara ula kulmaa shakhsiyaad sidoo kalena waa wax ku dhisan qaab nololeedka maalin walba! Iyadoo keli ahaan eraygan la qeexana waxa ka fudud iyada oo qof lagu tilmaamo. Haddaba, dhinacyada ugu wanaagsan ee shakhsiyaadka lagula xidhiidhiyay waxa aan kasoo qaadan karnaa

1. Ibraahim iyo farcankiisa

2. Daa'uud iyo Israa'iil

Haddaba nimankani waxa ay ahaayeen kuwo la kulmayo Ilaah iyada oo kaddibna noloshoodu is bedeshay (maaha nolol wanaageedu dhammays tiran yahay laakiin rumaysadkooda ayaa sii socday). Tijaabinta ayaa waxay u muujisay awoodda iyo taag yaraanta rumaysadkooda la kulmay Ilaah, hase ahaatee isku hallaynta iyo u dhowaanshihiisa ayaa wuxuu ahaa marba marka ka danbaysa sii socda. Way tijaabiyeen, laakiinse waa ay kusii socdeen iyada oo taasna ay cadaynaysay ducadooda iyo qaab nololeedkooda.

II. Asalka ugu muhiimsan ee la adeegsaday

A. *îa* (BDB 52)

1. FAL

a. *Qal* asalkeeda – taageeris, nafaqayn (2 Boqorradii 10:1,5; Esteer 2:7, adeegsiga aan fiqiga ahayn)

b. *Niphal* asalkeeda – la hubiyo, la asaaso, la ansixiyo, lagu kalsoonaan karo amaba aaminimada

(1) Niman, Ishacyaah 8:2; 53:1; Yeremyaah 40:14

(2) Waxyaalo, Ishacyaah 22:23

(3) Ilaah, Sharciga Kunoqoshadiisa 7:9,12; Ishacyaah 49:7; Yeremyaah 42:5

c. *Hiphil* asalkeeda – in lagu taagnaado, la aamino, la talo saarto

(1) Ibraahim Ilaah ayuu aaminay, Bilowgii 15:6

(2) Israa'iiliyiintii Masar ku sugnaa way rumaysteen, Baxniintii 4:31; 14:31 (inkiraad, Sharciga Kunoqoshadiisa 1:32)

(3) Israa'iiliyiintu YHWH waxay ku rumaysteen la hadalkii Muuse, Baxniintii 19:9; Sabuurka 106:12,24

(4) Axaas iskuma hallayn Ilaah, Ishacyaah 7:9

(5) Midkasta oo rumaysta isaga, Ishacyaah 28:16

(6) Aamin runta ku saabsan Ilaah, Ishacyaah 43:10-12

2. MAGAC (LAB AH) – runsheegnimada (Sharciga Kunoqoshadiisa 32:20; Ishacyaah 25:1; 26:2)

3. FALKAABE – runtii, dhab ahaantii, waan taageersanahay, waa sidaa (Sharciga Kunoqoshadiisa 27:15-26; 1 Boqorradii 1:36; 1 Taariikhdii 16:36; Ishacyaah 65:16; Yeremyaah 11:5; 28:6). Waana midda ka tarjumaysa adeegsiga “Aamiin” ee Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub.

B. (BDB 54) MAGAC DHEDIG AH, ku taagni, runsheegnimo, xaqiiqada

1. Niman, Ishacyaah 10:20; 42:3; 48:1

2. Ilaah, Baxniintii 34:6; Sabuurka 117:2; Ishacyaah 38:18,19; 61:8

3. Xaqiiqada, Sharciga Kunoqoshadiisa 32:4; 1 Boqorradii 22:16; Sabuurka 33:4; 98:3; 100:5; 119:30; Yeremyaah 9:4; Sekaryaah 8:16

C. (BDB 53), ku taagni, u go'itaan, u hogaansanaan

1. Gacmaha, Baxniintii 17:12

2. Wakhtiyada, Ishacyaah 33:6

3. Aadahna, Yeremyaah 5:3; 7:28; 9:2

4. Ilaah, Sabuurka 40:11; 88:12; 89:2,3,6,9; 119:138

III. Bawlos iyo adeegsiisa fikraddan Axdiga Hore

A. Bawlos fahankiisna cusub ee ku saabsan YHWH iyo Axdiga Hore waxa uu ku salaynayaa shakhsi ahaantiisa sidii uu ula kulmayo Ciise markii uu u socday Dimishiq (Falimaha Rasuullada 9; 22; 26).

B. Wuxuu helay Axdiga Cusub oo fahankiisa ku taageeraya siyaabaha la xidhiidha asalka arrintan.

1. Bilowgii 15:6 –Ibraahim la kulankiisii shakhsi ahaaneed ee Ilaah uu la bilaabay (Bilowgii 12) waxa ka dhashay nolol ku salaysan addeecitaan iyo rumaysad (Bilowgii 12-22). Waxaanu Bawlos middani ku tibaaxayaa Rooma 4 iyo Galatiya 3.

2. Ishacyaah 28:16 – kuwa aamina middani (tijaabada iyo ku taagnaanshaha arrintas aasaaska ah)

weligood ma noqon doonaa

a. Rooma 9:33, “ceebooba” amaba “niyad jaba”

b. Rooma 10:11, kuwo ceeboobi

3. Xabaquuq 2:4 – kuwa yaqaana Ilaah runsheegga ahi waxay ku noolaan doonaan nolol rumaysad leh (Yeremyaah 7:28). Bawlos wuxuu qoraalkan ku adeegsanayaa Rooma 1:17 iyo Galatiya 3:11 (sidoo kale u fiirso Cibraaniyada 10:38).

IV. Butros iyo adeegsiyiisa fikiradan Axdiga Hore

A. Butrus wuxuu isku xidhayaa

1. Ishacyaah 8:14 – 1 Butros 2:8 (dhagax lagu turun turroodo)

2. Ishacyaah 28:16 – 1 Butros 2:6 (dhagax geeseed)

3. Sabuurka 111:22 – 1 Butros 2:7 (dhagaxii kuwa wax dhisaa diideen)

B. Wuxuu ka soo jeedinayaa luqadii gaarka ahayd ee tilmaamaysay Israa’iil, “kuwa la doortay, boqorrada wadaadnimada, ummadda quduuska ah, dadka Ilaah matalaya”

1. Sharciga Kunoqoshadiisa 10:15; Ishacyaah 43:21

2. Ishacyaah 61:6; 66:21

3. Baxniintii 19:6; Sharciga Kunoqoshadiisa 7:6

Isagoo iminkana u adeegsanaya rumaysadka kaniisadda ee ku salayan Masiixa.

V. Yooxanaa iyo adeegsiyiisa fikraddan Axdiga Hore

A. Adeegsiyiisa Axdiga Cusub

Erayga “aaminay” waxa laga soo qaatay erayga Giriigga ah ee (*pisteuō*), kaasi oo sidoo kale loo tarjumi karo “aaminis,” “rumays,” amaba “talo saarasho.” Tusaale ahaan, MAGACU kumuu soo dhex aroorin Injiilka uu qoray Yooxanaa, laakiinse FALKA in badan ayaa lagu dhex adeegsaday. Yooxanaa 2:23-25 lama hubo in dadka soo ururay ee diyaarka u ahaa raacitaanka Ciisihii reer Nasareet. Tusaalayaasha kale ee sida aadka ah loogu adeegsaday eraygan “rumaysi” ayaa waxa aan ka arki karnaa Yooxanaa 8:31-59 iyo Falimaha Rasuullada 8:13, 18:24. Haddaba, xaqiiqada rumaysadka ee kitaabiga ahi waxay ka badan tahay rumaysadka ugu horreeya oo keliya. Waxa la rabaa inay noqota wax sii socda oon kala go’aynin (Matayos 13:20-22, 31-32).

B. Adeegsiyiisa marka ay la socdaan MEELEEYAYAASHU

1. *eis* oo macneheedu yahay “gudihiiisa.” Qaab dhismeedkan gaarka ahi wuxuu xoojinayaa rumaystayaasha oo rumaysadkooda iyo isku hallayntooda dhex dhigay Ciise.

a. magaciisa (Yooxanaa 1:12; 2:23; 3:18; 1 Yooxanaa 5:13)

b. Isaga (Yooxanaa 2:11; 3:15,18; 4:39; 7:5,31,39,48; 8:30; 9:36; 10:42; 11:45, 48; 17:37,42; Matayos 18:6; Falimaha Rasuullada 10:43; Filiboy 1:29; 1 Butros 1:8)

c. Anigu (Yooxanaa 6:35; 7:38; 11:25,26; 12:44,46; 14:1,12; 16:9; 17:20)

d. Wiilka (Yooxanaa 3:36; 9:35; 1 Yooxanaa 5:10)

e. Ciise (Yooxanaa 12:11; Falimaha Rasuullada 19:4; Galatiya 2:16)

f. Iftiinka (Yooxanaa 12:36)

g. Ilaah (Yooxanaa 14:1)

2. *en* oo macneheedu yahay “gudaha” sida ku sugan Yooxanaa 3:15; Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 5:14

3. *epi* oo macneheedu yahay “gudaha” amaba “galis” sida aan ka arki karno Matayos 27:42; Falimaha Rasuullada 9:42; 11:17; 16:31; 22:19; Rooma 4:5, 24; 9:33; 10:11; 1 Timoteyos 1:16; 1 Butros 2:6.

4. XAALADDA KU TIRINTA iyadoo aanu la soconin MEELEEYAYAASHU sida aan ka arki karno Galatiya 3:6; Falimaha Rasuullada 18:8; 27:25; 1 Yooxanaa 3:23; 5:10

5. *hoti* oo macneheedu yahay “rumaysanahay” oo tusinaysa waxa la rumaysanayaa wuxuu koobsanayo

a. Ciise waa Kan Quduuska ah ee Ilaah (Yooxanaa 6:69)

b. Ciise waa Isagii (Yooxanaa 8:24)

c. Ciise wuxuu ku dhex jiraa Aabbaha, oo Aabbuhuna isaguu ku dhex jiraa (Yooxanaa 10:38)

d. Ciise waa Masiixa (Yooxanaa 11:27; 20:31)

e. Ciise waa Wiilka Ilaah (Yooxanaa 11:27; 20:31)

- f. Ciise waxa soo diray Aabbaha (Yooxanaa 11:42; 17: 8,21)
- g. Ciise wuxuu la mid yahay Aabbaha (Yooxanaa 14:10-11)
- h. Ciise wuxuu ka yimid Aabbaha (Yooxanaa 16:27,30)
- i. Ciise wuxuu naftiisa ku magacaabay magacii axdiga ee Aabbaha, “Isaga”(Yooxanaa 8:24; 13:19)
- j. Waxaan la noolaan doonaa Isaga (Rooma 6:8)
- k. Ciise wuu dhintay waanu sarakacay (1 Tesaloniika 4:14)

VI. Gebogabada

Rumaysadka kitaabiga ahi waa dadka oo ka jawaab celiya erayga Waxyiga ah iyo ballan qaadkiisa. Ilaah had iyo waxbuu socodsiiyaa (Yooxanaa 6:44,65), laakiinse qaybta ka midka ah Waxyigan xidhiidhintiisa ayaa ah baahida aadanuhu u qabaan inay kaga jawaaba celiyaan

A. Isku hallayn

B. Addeecitaanka axdiga

Rumaysadka kitaabiga ahi waxa weeyi

1. Xidhiidh shakhsi ahaaneed (rumaysadka koobaad)
2. Rumaysashada xaqiiqada kitaabiga ah (rumaysashada waxyiga Ilaah)
3. In si haboon loo addeeco loogana jawaaba celiyo (rumaysadka maalin walba)

Rumaysadka kitaabiga ahi maaha tigidh lagu tago janada amaba siyaasad uu ku jiro damaanad qaad, laakiin waa xidhiidh shakhsi ahaaneed. Waa ujeedada loo abuuray aadanaha iyada oo laga sameeyay ekaanshaha (Bilowgii 1:26-27) Ilaah. Arrintu haddaba waa “xidhiidh.” Ilaah wuxuu u baahan yahay weheshi in lala yeesho, laakiinse maaha heerka laga taagan yahay fiqi ahaan! Haddaba weheshiga Ilaaha quduuska ah lala yeelanayaa waa mid dalbanaya in carruurta ay ka tarjumaan oo muujiyaan dabeecadda Ilaah (quduusnimda, Laawiyyintii 19:2; Matayos 5:48; 1 Butros 1:15-16). Leexashadu (Bilowgii 3) waxay saamaysay kartideennii ahayd inaan si saxa u jawaab celino. Sidaasi darteedna, Ilaah wuxuu ka jawaab celiyay arrintaas (Yexesqeel 36:27-38), isaga oo ina siinaya “qalbi cusub” iyo “ruux cusub,” taasi oo rumaysadka iyo toobad keenka inoogu suurto gelinaysa inaan weheshi la yeelano oo addeecno isaga!

Dhammaanba saddexdani waa kuwo muhiim ah, waana in saddexdanba la wada sameeyo. Ujeedadu waxa weeyi in la ogaado oo la garto Ilaah (macnaha ay samaynayaan Cibraaniyada iyo Giriigguba) iyo in dabeecaddiisu ay ka muuqato qaab nololeedkeenna. Ujeedada rumaysadku maaha inaan maalin ku tegi doono janada. Laakiinse waa la midnimada Masiixa ee maalin walba!

Rumaysashada aadanuha ayaa ah natiijada (Axdiga Cusub), mana aha waxyaalaha ku salaysan (Axdiga Hore) ee ah xidhiidhka lala yeelanayo Ilaah: rumaysadka aadanuhu ka qabaan runsheegnimadiisa; kalsoonida aadanuhu ka qabaan isku hallayntiisa. Aragtida halbowlaha u ah Axdiga Cusub badbaadadiisu waa in aadanuhu ay ka jawaaba celiyaan ooo kusii socdaan nimcada iyo naxariista Ilaah ee ku timid Masiixa. Wuu jeclaaday, wuu soo diray, wuu ku deeqay; inaguna waa inaan kaga jawaab celino rumaysad iyo runsheegnimo (Efesos 2:8-9 iyo 10)!

Ilaah runsheega ahi wuxuu rabaa dad runsheeg ah si uu kuwa aan rumaysadka lahayn ugu muujiyo naftiisa iyo si uu iyaga ugu keeno rumaysadkiisa.

1:15 “waa iga horreeyey” Tani waa caqiidadii Yooxanaa Baabtiistaha oo ahayd inuu si xooggan u rumaysnaa jiritaankii hore ee Ciise (1:1; 8:56-59; 16:28; 17:5; 2 Korintos 8:9; Filiboy 2:6-7; Kolosay 1:17; Cibraaniyada 1:3; 10:5-8). Caqiidada ah sii jiritaanka hore waxa ay sheegaysaa in uu jiro Ilaah marwalba taariikhda ka horreeyay, isaga oo ilaa haddana ku dhex shaqaynaya taariikhda. Waxa ay tani tahay arrin muhiim ah oo ay Masiixiyiintuna ku rumaysan yihiin kitaabka.

▣ Aayaddani waa ay sirgaxantahay waxaana inbadan la isku dayay in la fahmo oo la fududeeyo qoraalka. Eeg Bruce M. Metzger, kitaabkiisa *A Textual Commentary on the Greek New Testament*, pp. 197-198. Sidoo kale waxa tusaale wanaagsan ah iyada oo falka Giriigga ah aan la qaabayn karin. Waa fal tegay oo loo diiwaan geliyay sidii fal jooga. Eeg Lifaafa Koobaad.

1:16-18 waxyaalaha uu caanka ku yahay Injiilka Yooxanaa ayaa waxa ay tahay isaga oo ka hadlayay xaalad, amaba dhacdo amaba waxbaris, ayaa waxa uu soo dhex gelinayaa faalladiisa uu arrintaas ka bixinayo. Waxa xitaa markasta aan suurto gal ahayn, in la kala saaro erayada Ciise, dadka kale iyo xitaa kuwa Yooxanaa. Culimada badankoodu waxa ay sheegaan in aayadaha 16-19 ay yihiin faallada qoraaga oo ah Yooxanaa (3:14-21).

1:16 “buuxnaantiisa” Waxa ay la macno tahay eragay Giriigga ah ee *pleroma*. Macallimiintii beenta ahaa ee Gnostic ga ayaa waxay u adeegsadeen inay ku sheegaan waxyaalaha u dhexeeya caqiidooyinka ay aaminsanaayeen. Ciise ayaa haddaba aha dhexdhexaadiyaha keliya (ka runta ah ee buuxa) ee u dhexeeya Ilaah iyo aadanaha (Kolosay 1:19; 2:9; Efesos 1:23; 4:13). Waxay haddaba u muuqataa in markale Rasuul Yooxanaa uu weerarayo waxbaristii iyo aragtidiisii beenta ahayd ee Gnostic gu qabeen.



NASB, NRSV “ka helnay nimco ka nimco”
NKJV “ka helnay nimco ilaa ka nimco”
TEV “isagoo nasiinaya barakoba barako kadib”
NJB “hadiyadba hadiyad kale ka danbayso”

Su’aasha fasirku waxa ay tahay sidee loo fahmi karaa “nimco.” ma waxay tahay

1. Naxariista Ilaah ee lagu helay badbaadada Masiixa
2. Naxariista Ilaah siiyo nololsha Masiixiyadda
3. Naxariista Ilaah ee ku jirta axdiga cusub ee Masiixa?

Arrintan furaha ka fikiritaankeedu waxa weeyi “nimco”; Ilaah waxa uu si cajiib leh nimco inoogu siiyay Masiixa. Ciise waa ogolaansha Ilaah ee aadanaha leexday (2 Korintos 1:20).

1:17 “sharciga” Sharcigii Muuse muu ahayn mid xun, laakiinse waxa uu diyaar garayn u ahaa badbaadada dhammayska tiran (5:39-47; Galatiya 3:23-29; Rooma 4). Sidoo kale Cibraaniyada ayaa waxa uu kala saarayaa oo is barbar dhigayaa shaqada/muujiinta/axdiyada Muuse iyo Ciise.

MAWDUUC GAAR AH: ARAGTIYADII BAWLOS EE SHARCIGII MUUSE

Waa wax wanaagsan oo ka yimid Ilaah (cf. 7:12,16)

- A. Ma aha jidka xaqnimada iyo aqbalitaanka Ilaah (oo waxa uu xitaa noqon karaa habaar, cf. Galatiya 3)
- B. Weli waa Ilaah doonistiisa u ahaatay rumaystayaasha maxaa yeelay isagu waa Ilaah Is-muujiintiisa (Bawlos waxa uu had iyo gooraale u soo xigtaa Axdigii hore in uu u muujiyo oo/ama ku dhiirri geliyo rumaystayaasha)
- C. Rumaystayaasha waxaa lagu war geliyey Axdigii Hore (cf. Rooma 4:23-24; 15:4; I Korintos 10:6,11), laakiin Axdigii Hore kuma aysaqn badbaadin (cf. Falimaha Rasuullada 15; Rooma 4; Galatiya 3; Cibraaniyada)
- D. Waxa uu ka dhex shaqeeyaa Axdiga Cusub si uu
 1. Ugu muujiyo Dembi badnaabta (cf. Galatiya 3:15-29)
 2. Ugu hago madax furashada aadanaha ee bulshada dhexdeeda ah
 3. Ugu war geliyo Masiixiga go’aannadiisa asalka ah

Tani waa shucaaca fiqi ahaaneed ee ka imanaysa inkaarta iyo dhimashada eek u aaddan barakada iyo joogtaynta ee dhibaatda ku sababaysa isku dayga in la fahmo Bawlos aragtidiisa ku aaddan Sharcigii Muuse. Sida ku jirta A Man in Christ, James Stewart waxa uu muujinayaa Bawlos fikirkiisii iyo qoraalkiisii is waafaqsanaa:

“Sida caadiga ah waxa aad fili lahayd nin isagu shaqsi ahaantiisa habaynayey in uu dhiso hab fikir iyo fiqi ah si uu si hadba dhan loo qaadan kaor ee macquulka ah ugu saleeyo ereyadiisii uu ku shaqeeyay. Waxa aad ka fili lahayd to in ujeedkiisu yahay saxnaanta barashada weedhaha fikirka uu hoggaaminayo. Belaakiin waxa aad weyddiin lahayd in erey, uu mar qoraagaagu u isticmaalay dareen gaar ah, uu waddada dareenkaas ku socon lahaa. Laakiin bal middan ka raadi Bawlos waa mid laga niyad jabo. Weedhihiisa badankood waa kuwo waddooyin badan qaadi kara, ma aha kuwo aan meelna u leexanayn. . . “Sharcigu waa qudduus” wuxuu qorayaa, ‘sharciga Ilaah ayaan kaga farxaa ninka gudaha ah’ (Rooma 7:12,22), laakiin sida cad waa arrin kale oo ah nomos waxa isaga ka dhigaya in uu sheego meel kale. “Masiix wuxuu inaga furtay inkaartii sharciga (cf. Galatiya 3:13)” (Bogga 26).

▣ **“nimcada”** tani waxa ay tusinaysaa oo tilmaamaysaa, jacaylka Ilaah ee aanay mutaysan aadanaha leexday (Efesos 2:8). Erayga nimco (*charis*), waxa ay aad muhiim uuga dhex tahay qoraallada Bawlos, laakiinse xagga Yooxanaa injiilkiisa halkan oo keliya ayaa lagaga adeegsaday (1:14, 16, 17). Qorayaasha Axdiga Cusub iyada oo uu hoggamiyanayo waxyigu, ayaa waxa ay xor u ahaayeen inay adeegsadaan ereyadooda u gaarka ah amaba tusaalayaasha.

Ciise waxa uu si runa u keenay runta “axdiga cusub” ee Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:22-38.

▣ **“runtu”** Waxa middan loo adeegsaday iyadoo macneheedu yahay (1) runsheegnimo amaba (2) runta kasoo horjeedda beenta (1:14; 8:32; 14:6). Fiiro gaara u yeelo runta iyo nimcada oo labaduba ku yimid Ciise (aayadda 14). Eeg Mawduuca Gaarka ah 17:3.

▣ **“Ciise”** Kani waa magacii ugu horreeyay ee loo bixiyo wiilkii Maryan oo ahaa magacii ugu horreeyay ee aadanaha loo bixiyo. Wiilkii horeba u jiray imika waxa uu noqday Wiil soo qaata jidh bani aadam!

1:18 “Ninna ma arkin Ilaah marnaba” Waxa dadka qaar sheegay middani inay ka hor imanayso Baxniintii 33:20-23. Si kastaba ha ahaatee, erayga Cibraaniga ah ee ku jira Baxniintii, waxa uu tilmaamayaa “dareen,” mana aha aragtida jidh ahaaneed ee Ilaah. Ujeedada aayadahani markaas waxa ay tahay, in Ciise oo keli ahi uu muujinayo Ilaah (14:8). Ma jiro aadane denbiile ah oo arkay Ilaah (6:46; 1 Timoteyos 6:16; 1 Yooxanaa 4:12, 20).

Aayaddani waxa ay sheegaysaa muujinta gaarka ah ee Ilaah isku dhex muujiyay Ciisihii reer Naasareet. Isagu waa muujinta Ilaah ee dhammayska tiran, taas macneheeduna waxa weeyi, inaad Ciise garataa waxa ay ka dhigan tahay inaad Ilaah garatay. Ciise waa is muujinta Ilaah ee aan xadka lahayn. Ma jirto si isaga ka qayb ah oo loo fahmi karo Ilaahnimada (Kolosay 1:15-19; Cibraaniyada 1:2-3). Ciise “wuxuu arkaa” Aabbaha, rumaystayaashuna waxay ku “arkaan” Aabbaha Ciise (Noloshiisa, ereyadiisa, iyo shuqulladiisa). Waxa weeyi muujinta dhammayska tiran ee Ilaaha aan la arki karin (Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:3).

▣

NASB	“Wiilka keliya oo Aabbaha”
NKJV	“Wiilka keliya ee madiga ah”
NRSV	“Wiilka Ilaah ee kelida ah”
TEV	“Wiilka keliya”
NJB	“Waa Wiilka kelida ah”

U fiirso *monogenēs* aayadda 1:14. Ciise waa Ilaah dhammays tiran iyo aadane dhammays tiran. Eeg fiiryooyinka gaarka ah ee 1:1.

Waxa jira qoraallo gacmeedyo Giriig ah oo halkan ku kala duwan. *Theos*/Ilaah waxa uu ku sugan yahay qoraal gacmeedyadii hore ee Giriigga P⁶⁶, P⁷⁵, B, iyo C, halka “Wiil” lagu beddelay “Ilaah” MSS A iyo C³ oo keliya. UBS⁴ waxa uu “Ilaah” ku qorayaa “B” iyada oo hubaal ah. Erayga “Wiil” waxa uu ka imanaya culimmo xasuusinaya “Wiilka keliya oo madiga ah” sida ku sugan Yooxanaa 3:16, 18 iyo 1 Yooxanaa 4:9 (Bruce M. Metzger kitaabkiisa *A textual Commentary on the Greek New Testament* p. 198). Waxa weeyi caddaynta Ilaahnimada dhammayska tiran ee Ciise! Waxaa markaas suurto gal ah in aayaddani ay xanbaarsantahay saddex magac oo Ciise leeyahay: (1) madiga, (2) Ilaah, iyo (3) oo ku jira laabta Aabbaha.

Waxa jira falaqayn xiiso leh oo ku saabsan suurto galnimada kaska ah ee la xidhiidha qoraalkan ee culimada xagjirka ah taasi oo ku sugan Bart D. Ehrmans kitaabkiisa *The Orthodox Corruption of Scripture*, p. 78-82.

▣ **“oo laabta Aabbaha ku jira”** waxa ay middani xagga macnaha aad uugala mid tahay “la jira” sida ka muuqata aayadaha 1 iyo 2. Waxa ay ka hadlaysaa la jiritaanka ama weheshiga aadka u dhow. Waxa ay markaasi tilmaami kartaa (1) Jiraankiisii amaba weheshigiisii horeba u jiray ama (2) Weheshigiisa dib loosoo celiyay.

▣

NASB	“kaasaa inoo sheegay”
NKJV	“kaasaa inoo caddeeyay”
NRSV, NJB	“kaasoo ina garadsiiyay”
TEV	“wuu ina ogaysiiyay”

Erayga Giriigga ah ee ku sugan aayadda 1:18 oo ah “exegesis” macnihiisu waa (“haggis ama tusin, ” oo ah inuu jiro jiheeye). Waxa uu markaasi tusinayaa muujin dhammays tiran. Ciise shaqooyinkiisa waxyaalihii ugu muhiimsanaa waxa ka mid ahaa inuu muujiyo Aabbaha (Yooxanaa 14:7-10; Cibraaniyada 1:2-3). Inaan Ciise aragno oo aqaansanaa waxa ay ka dhigantahay inaan Ilaah aragnay oo aqoonsanay (jeclaanta denbiilayaasha, kaalmaynta kuwa taagta daran, aqbalitaanka caydhinta, aqbalitaanka haweenka iyo carruurta)!

Eraygan Giriigga waxa loogu adeegsaday kuwa wax ka sharaxa ama ka fasira farriinta, riyada, ama qoraal. Waxa laga yaabaa halkan markale in Yooxanaa uu ku adeegsanaya eray leh manco u samaynaya Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahaynba (sida *logos* ee aayadda 1). Waxa uu Yooxanaa isku dayayaa inuu isla xidhiidhiyo Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn, waxaanu erayga macnihiisu noqon karaa

1. Xagga Yuhuudda waa ka fasira ama sharaxa Sharciiga
2. Xagga Giriigga waa ka sharraxa ama fasira ilaahyada.

Ciise dhexdiisa iyo Ciise oo keliya ayaa aadanuhu si buuxda waxay uugu arkayaan si buuxdana ugu fahmi karaan Aabbaha.

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Qeexitaan ku samee *logos* asalkeedii hore ee diin ahaaneed, cilmaani ahaaneed, iyo adeegsigeeda xagga kitaabka.
2. Caqiidada ah inuu Ciise weligiisba hore u jiray maxay muhiim u tahay?
3. Maxay tahay qaybta aadanuhu ku leeyahay badbaadada? Sidee qof ku aqbali kara Ciise?
4. Maxay erayga amaba hadalka muhiim ugu ahayd inuu jidh noqdo?
5. Maxay sababaya inay adkaato in kormar guud lagu sameeyo aayadahan aan soo dhaafnay?
6. Waxaad diiwaan gelisaa xaqiiqooyinka fiqi ahaaneed ee kala gedisan kuwaasi oo loo adeegsaday in Ciise wax laga sheego (ugu yaraan 8).
7. Aayadda 18 maxaa ka dhigay inay muhiimad aad u wayn yeelato?

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 19-51

A. Aayadahan waxa ay ku saabsan yihiin Yooxanaa Baabtiisaha oo la tacaalaya labo waxyaaloo oo kaniisaddii hore si qaldan u fahmeen.

1. Waxyaabihii ku saabsanaa shakhsiyadda Yooxanaa Baabtiisaha ee aan caddayns sida ka muuqata aayadaha 6-9, 20, 21, 25; iyo 3:22-36;
2. Waxyaalaha la xidhiidha Masiixa sida ka muuqata aayadaha 32-34. Waxyaabaha khuraafaadka ah ee sidoo kale Gnostic gu aaminsanaayeen ayaa iyadana sidoo kale waxa loogu weeraray 1 Yooxanaa 1. Yooxanaha Koobaad waxa laga yaabaa inuu jeldi u ahaa Injiilka Yooxanaa.

B. Injiilka Yooxanaa waxa uu ka gaabsanayaa baabtiiskii Ciise Masiix ee Yooxanaa Baabtiisuhu uu baabtiisay. Subkitaankii kaniisadda, baabtiiska iyo Eucharist intuba waa ay ka maqan yihiin diiwaan gelinta Yooxanaa ee ku saabsan noloshii Masiixa. Haddaba, waxa jira labo sababood oo arrintan loo aanayn karo:

1. Fikirradii kaniisaddii hore ayaa Yooxanaa waxa ay ku sababeen inaanu waxba ka sheegin dhinaca Masiixiyadda. Injiilkiisuna waxa uu diiradda saarayaa xidhiidhka laakiinse maaha waxyaalaha khuseeya adeegyada. Kama hadlayo labada waxyaalood ee ah baabtiiska iyo Cashada Rabbiga gebi ahaantoodaba. Waxa laga yaabaa haddaba maqnaanshaha waxyaalahani inay ahaayeen kuwo dareenka raad ku yeelan doonay.
2. Yooxanaa qoraalkiisa oo ka danbeeyay qoraallada kale ee Injiilka darteed ayaa diiwaan gelintiisa noloshu Masiixa waxa uu u adeegsaday isaga oo kabaya kuwa kale. maadaama oo injiillada kale

dhammaantood ay ka hadleen waxyaalahan adeegyada ah, ayaa Yooxanaa waxa uu qorayaa warbixin dheeraad ah oo la xidhiidhay dhacdooyinkii jiray. Tusaale ahaan, waxa uu ka hadlayaan markii qolka ay ku jireen waxyaalihii dhacay (cutubyada 13-17) laakiinse kama hadlayo cashara Rabbiga laf ahaaneeda.

- C. Waxa uu aad u sheegayaa una xoojinayaa markhaati furkii Yooxanaa Baabtiisuhu uu ka markhaati kacay shakhsiyadda Ciise. Haddaba, Yooxanaa waxa uu samaynayaa odhaahyada Masiixa la xidhiidha ee sidan ah:
1. Ciise waa Wanka Ilaah (aayadda 29) waana magac Ciise loogu adeegsaday halkan iyo Muujintii dhexdeeda oo keliya.
 2. Ciise weligiisba hore ayuu u jiray (aayadda 30)
 3. Ciise waa aqbalaha iyo bixiyaha Ruuxa Quduuska ah (aayadda 33)
 4. Ciise waa Wiilka Ilaah (aayadda 34)
- D. Xaqiiqada ku saabsan shakhsiyadda iyo shaqada Ciise waxa shakhsi ahaan uga markhaati kacay
1. Yooxanaa Baabtiistaha
 2. Andros iyo Simcoon
 3. Filibos iyo Nataana'eel
- Middani haddaba waxa ay noqonaysaa qaabka guud ahaaneed ee Injiilku adeegsadanayo. Waxa uu koobsanayaa toddobo iyo labaatan hadal oo ku saabsan Ciise amaba Ciise la jira kana markhaati furaya.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 1:19-23

¹⁹Kanu waa maraggii Yooxanaa furay, markii Yuhuuddu Yerusaaalem uga soo direen wadaaddo iyo kuwo reer Laawi ah inay weydiyaan oo ku yidhaahdaan. Yaad tahay? ²⁰Isagu waa qirtay, mana uu inkirin, oo wuxuu qirtay oo yidhi, Anigu ma ihi Masiixa. ²¹Markaasay weydiyeen, Haddaba yaad tahay? Ma Eliyaas baad tahay? Wuxuuna yidhi, Ma ihi. Ma nebigii baad tahay? Wuxuuna ku jawaabay, Maya. ²²Waxay haddaba ku yidhaahdeen, Yaad tahay? si aannu jawaab ugu celinno kuwii na soo diray. Yaad isku sheegaysaa? ²³Wuxuu yidhi, Waxaan ahay codka kan cidlada kaga qaylinaya, Jidka Rabbiga toosiya, siduu nebi Isayos u yidhi.

1:19 “Yuhuudda” Yooxanaa dhexdiisa middan waxa loogala jeedaa (1) Dadkii Yahuudiya ee kasoo horjeeday Ciise ama (2) hoggaamiyayaashii diinta ee Yuhuudda oo keliya (2:18; 5:10; 7:13; 9:22; 12:42; 18:12; 19:38; 20:19). Culimada qaarkood ayaa waxa ay sheegaan, in Yuhuuddu aanay Yuhuud kale sidan ugu tilmaameen. Si kastaba ha ahaatee, Yuhuudda kasoo horjeeditaankoodii Masiixiyaddu waxa uu sii xoogaystay kaddib Guddigii Jamniya ee 90 C.D.

Erayga “Yuhuud” asal ahaan waxa uu ka yimid qabiilkii Yahuudah. Markii labo iyo tobankii qaybiil ay qaybsameen 922 C.H., Yahuudah waxa uu noqday magaca saddexdii qabiil ee koonfurta. Labadii boqortooyo ee Yuhuudda oo kala ahaa Israa’iil iyo Yahuudah, waa la mustaafuriyay, laakiin inyar oo badankoodu ahaa reer Yahuudah ayaa uu soo celiyay Kuuros xukunkiisii taariikhdu markay ahayd 538 C.H. intaas kaddib eraygani waxa uu noqday magaca carruurtii farcankii Yacquub ee deganaa Falastiin ilaa Bariga dhexe oo dhan.

Injiilka Yooxanaa dhexdiisa eraygani guud ahaan waa diidmo, laakiin adeegsigeeda guud ahaaneed waxa uu ka muuqan karaa 2:6 iyo 4:22.

☐ **“wadaaddo iyo kuwo reer Laawi ah”** Yooxanaa Baabtiisuhu waxa uu ahaa sidoo kale wadaad (Luukos 1:5). Erayga Laawi waa marka keliya ee Injiilkan ay kusoo dhex aroorayso, waxaana suurto gal ah inay ahaayeen ilaaliyaasha Macbadka. Waxa ay ahaayeen koox gaara “xaqiiqo raadiyayaal” ay soo direen hoggaamiyayaashii diinta ee Yerusaaalem (aayadda 24). Wadaaddada iyo Laawiyiintu hadiyo goor waxa ay ahaayeen Sedduukiyiin, halka culimadu ay badanaa ka ahaayeen Farriisiyiinta (aayadda 24). Haddaba, labadan kooxoodba waxa ay ku mashquulsanaayeen wax iska waydiinta Yooxanaa Baabtiisaha. Siyaasiyiinta iyo hoggaamiyayaasha diintuna waxa ay isku bahaysteen, inay mucaaradaan Ciise iyo kuwa isaga raacay.

▣ **“Yaad tahay?”** Isla su’aashan ayaa Ciise lagu waydiiyay 8:25. Yooxanaa Baabtiisaha iyo Ciiseba waxa ay wax u bareen oo u dhaqmeen si aan raalli gelinin hoggaamiyayaashii Yuhuudda, maxaa yeelay waxa ay labada ninba ka aqoonsadeen waxyaalo ku sugan Axdiga Hore. Su’aashani haddaba, waxa ay la xidhiidhay waxyaalihii ay filayeen Yuhuuddu ee ahaa dhammaadka wakhtiga iyo Da’da Cusb.

1:20 “Isagu waa qirtay, mana uu inkirin, oo wuxuu qirtay” odhaahdani waa mid xooggan, oo ah diidmada inuu yahay Masiixii la filaayay. Wax ku saabsan “qirasho” eeg Mawduuca Gaarka ah 9:22.

▣ **“Masiixa”** “Masiix” waa tarjumaadda erayga Cibraaniga ah ee “*masiah*” oo macnihiisu ahaa “loo la subkay/doortay.” Axdiga Hore dhexdiisa fikirka la xidhiidha subkistu waxa uu ahaa iyada oo la sheegayo qof Ilaah u yeedhay una qalabeeyay shaqo gaar ah. Boqorrada, wadaaddada, iyo nebiyaduba waxa ay ahaayeen kuwo la subko. Waxa markaasi lagu magacaabi karaa Kan gaarka ah ee hawl gelin doona da’da cusub iyo xaqnimada. Haddaba, dad badan ayaa waxa ay Yooxanaa Baabtiisaha u malaynayeen inuu yahay Masiixii la ballan qaaday (Luukos 3:15) maxaa yeelay waxa uu ahaa, ninkii u horreeyay ee loo waxyoodo kuna hadla magaca YHWH kaddib mudo gaadhaysay afar boqol oo sanadood.

Halkan iyada ah waxa aan jeclahay inaan kusoo dhex geliyo faalladayda ka imanaysa Daanyeel 9:26 kuna saabsan “Masiixa.”

Daniel 19:26

NASB	“Masiixa”
NKJV	“Masaaya”
NRSV	“ka la subkay”
TEV	“hoggaamiyaha Ilaah doortay”
NJB	“Kan La Subkay”

Adkaanta fasiraadda aayaddan waxa sababay, macnayaasha suurto galka ah ee la xidhiidha erayga Masiix amaba ka la subkay (BDB 603):

1. Waxa loo adeegsaday boqorrada Yuhuudda (I Samuu’eel 2:10; 12:3)
2. Waxa loo adeegsaday wadaaddada Yuhuudda (Laawiyyintii 4:3, 5)
3. Waxa loo adeegsaday Kuuroos (Ishacyaah 45:1)
4. #1 iyo #2 waxa lala xidhiidhiyay Sabuurka 110 iyo Sekaryaah 4
5. Waxa loo adeegsaday boqortooyada Ilaah ee gaarka ah kana iman doonta Boqortooyada Daa’uud oo ah da’da cusub ee xaqnimada keeni doonta
 - a. Farcanka Yahuuda (Bilowgii 49:10)
 - b. Gurigii Yesay (2 Samuu’eel 7)
 - c. xukunka caalamka (Sabuurka 2; Ishacyaah 9:6; 11:1-5; Miikaah 5:1-4)

Shakhsi ahaan ku magacaabista Ciisihii reer Naaserteet “ka la subkay” waxa ay iisoo jiidatay sababtoo ah:

1. Hordhaca boqortooyada weligeed ah ee cutubka 2
2. Hordhaca “Wiilka Aadanaha” ee 7:13 oo la siiyay boqortooyada weligeed ah
3. Badbaadada 9:24 qiimaha leh ee taariikhda dunida leexatay
4. Ciise oo kitaabka Daanyeel Axdiga Cusub ku dhex adeegsaday (Matayos 24:15; Markos 13:14)

1:21 “Haddaba yaad tahay? Ma Eliyaas baad tahay?” Sababtu waxa ay ahayd Eliyaas oon dhimanin oo Laakin samada loo qaaday (2 Boqorradii 2:1), waxaana la filayay inuu soo laaban doono Masiixa hortii (Malaakii 3:1; 4:5). Yooxanaa Baabtiisuhu waxa u ekaa oo u dhaqmayay sidii Eliyaas oo kale (Sekaryaah 13:4).

▣ **“Ma ihi.”** Yooxanaa Baabtiisuhu isumuu arkaynin inuu yahay mid adeegsanaya doorkii Eliyaas, laakiinse waxa uu arkayay Ciise oo buuxiyay waxsii sheegistii Malaakii (Matayos 11:14; 17:12).

▣ **“Ma nebigii baad tahay?”** Muuse ayaa waxa uu sii sheegay mid isaga la mida (oo uu ku magacaabay “nebigii”), inuu iman doono isaga dabadiis (Sharciga Kunoqoshadiisa 18:15, 18; Yooxanaa 1:25; 6:14; 7:40; Falimaha Rasuullada 3:22-23; 7:37). Waxa jirtay labo siyaabood oo kala duwan isla markaasna eraygan loogu dhex adeegsaday Axiga Cusub: (1) iyada oo ah qaab ka duwan Masiixa (7:40-41) ama (2) iyada oo lagu magacaabay Masiixa (Falimaha Rasuullada 3:22).

1:23 “Waxaan ahay codka kan cidlada kaga qaylinaya” middan waxa lagasoo xigtay tarjumaadda Septuagint ga ee Ishacyaah 40:3 iyadoo la tilmaamayo sida ay ula midka tahay Malaakii 3:1.

▣ **“Jidka Rabbiga toosiya”** Waa xigasho lagasoo xigtay (Ishacyaah 40:3) qoraalka Ishacyaah (cutubyada 40-54) kaasoo ay kusoo arooreen tilmaamista Adeegaha (42:1-9; 49:1-7; 50:4-11; 52:13-53:12). Ugu horrayntii waxa ay tilmaamayeen Israa’iil, laakiinse sida ka muuqata 52:13-53:12, cibaaradan waxa laga dhigay keli ahaan. Fikirka ahaa toosinta jidku wuxuu ahaa u diyaar garowga booqashada boqorka. Erayga “toosin” waxa ay ku dhowdahay oo la xidhiidhaa “xaqnimada.” Eeg Mawduuca Gaarka ah ee 1 Yooxanaa 2:29.

Baaragaraafkan oo dhan waxa uu Rasuul Yooxanaa ku gaar yeelay ka hadalka Yooxanaa Baabtiisaha, sababtuna waxa ay ahayd waxa jiray kooxo badan oo qarnigii koobaad fahan qaldan ka qaatay Yooxanaa Baabtiisaha isla markaasna ka dhigtay hoggaamiyohooda ruuxiga ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 1:24-28

²⁴Kuwa la soo diray waxay ka yimaadeen Farrisiinta. ²⁵Markaasay weydiiyeen oo ku yidhaahdeen, Haddaba maxaad dadka u baabtiistaa haddaanad ahayn Masiixa ama Eliyaas ama nebigii? ²⁶Yooxanaa wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi, Anigu waxaan dadka ku baabtiisaa biyo. Iaakiin dhexdiinna waxaa jooga mid aydnaan Garanaynin ²⁷oo ah kan iga daba imanaya, kan aanan istaahilin inaan yeelmaha kabtiisa furo. ²⁸Waxyaalahaasu waxay ka dhaceen Beytaniya taas oo ku taal Webi Urdun shishadiisa, oo ahayd meeshii Yooxanaa dadka ku baabtiisayay.

1:24 “Kuwa la soo diray waxay ka yimaadeen Farrisiinta.” Qoraalkani waa midaan maldahan, waxaana loogala jeedi karaa (1) Farrisiyiinta oo Yooxanaa Baabtiisaha usoo diray kuwii su’aalaha waydiinayay (aayadda 19) ama (2) kuwa su’aalaha waydiinayay waxay ahaayeen Farrisiyiinta, taasi oon ahayn mid caadi maxaa yeelay badanaa wadaaddadu waxay ahaayeen Sadduukiyiinta (aayadda 9). Waxa ay u muuqataa inay sheegayso koox kale oon ahayn kuwa aayadda 19.

MAWDUUC GAAR AH: FARRIISIYIIN

- I. Eraygan asalkiisu waxa uu leeyahay waxyaabahan suurto galka ah ee ah sidan:
 - A. “ka socnaan.” Kooxdani waxa ay samaysmeen wakhtigii Makaabiyaanka.
 - B. “Qaybin.” Tani waa macne kale oo la mida asalka Cibraaniga. Qaarkood waxay sheegaan in macneheedu yahay fasiraa (2 Timoteyos 2:15).
 - C. “Aasiyaan.” Waa macne kale oo la mida asalka Aramaatiga. Caqiidooyin ka mida Farrisiintu waxa ay waxyaalo badan la wadaagayeen Aasiyaankii ahaa Zorostarayiinta.
- II. Waxa aysoo samaysmeen wakhtigii Makaabiyaanka oo ka yimid *Hasidim* (kuwo diin leh). Kooxa kala duwanaa sida Esseyiintu waxay ka yimaadeen iyagoo kasoo horjeeday kuna kacsanaa Hellenistigii Antiyokh IV Epefaanes. Farrisiyiinta ugu horrayn waxa lagu sheegay Josephus kitaabkiisa *Antiquities of the Jews* 8.5.1-3.
- III. Caqiidooyinkoodii ugu muhiimsanaa
 - A. Rumaysadka imaatinka Masiixa kaasi oo aad u saameeyay qoraallada Yuhuudda sida I Enoch.
 - B. Ilaah oo nolol maalmeedka ku dhex shaqayanaya. Waxa ay tani si toosa ugasoo horjeeday Sadduukiyiinka. Kuwo badan oo ka mid ahaa caqiidada Farrisiinta waxa ay fiqi ahaan kasoo horjeedeen caqiidada Sadduukiinta.
 - C. Jidh ahaan u jajaban nolosha danbe ee ku salaysan tan dunida, kaasi oo koobsanayay abaal marinta iyo ciqaabta (Daanyeel 12:2).
 - D. Awoodda Axdiga Hore iyo Sharci Dhaqameedyada (Talmud). Waxa ay ku baraarugsanaayeen addeecitaanka ammarrada Axdiga Hore iyagoo sidoo kalena ku fasiray oo ku dabay dugsiyadii culimada rabbaaniyiinta. (Shammai, xagjirka iyo Hillel, dhexdhexaad). Fasiraadda rabbaaniyiintu waxa ay ahayd mid ku salaysan dood u dhaxaysay labo faylasuufi oo kala duwanaa, oo mid ahaa xagjir ka kalena aahaa dhexdhexaad. Doodahan caadiga ahi waxa ay tusinayaan macnaha Qorniinka ugu dambayntii loo qoray labada qaab: Talmuudkii Baabiloon iyo Talmuudkii Falastiiniyiinta ee aan dhammayska tirnayn. Waxa ay rumaysnaayeen in Muuse uu fasiraaddan hadalka ah ku helay Buur Siinay. Sidoo kalena falaqaynta dhaqan ahaaneed ee taariikhiga ahi waxa la bilaabantay Cesraa iyo “Kuwii ugu sarreeyay Sanagooga” (waxa markii danbe loo bixiyay Sanhedarin).
 - E. Caqiidada la xidhiidha ruuxa iyo Malaa’ignimada. Waxa ay koobsanayeen khayrka iyo sharka labadaba, waxaanay fikraddani ka timid Aasiyaanka iyadoo soo dhex gashay suugaantii Yuhuudda.

1:25 “Haddaba maxaad dadka u baabtiistaa” Baabtiiska waxa Yuhuuddii hore ay u samayn jiray kuwa aan Yuhuudda ahayn ee raba inay kusoo biiraan, laakiin caadi may ahayn in Yuhuuddu iyaga dhexdoodu is baabtiisaan (Yuhuuddii reer Qumran ayaa is baabtiisi jiray iyaga oo xitaa u maydhi jiray kuwa macbadka ku cibaadaysanaya gelitaanka ka hor). Waxa laga yaabaa qoraalkani inuu koobsanayo sharcigii Masiixa ku saabsanaa sida ku sugan Ishacyaah 52:15; Yexesqeel 36:25; Sekaryaah 13:1.

☐ **“Haddaanad”** waa jumlad koobsanaysa shuruud taasi oo tusinaysa khusaysana runta ku jirta qoraaga hadalkiiga iyo ujeedadiisa.

☐ **“ahayn Masiixa ama Eliyaas ama nebigii?”** Waxa xiiso leh oo qoraallada laga helay Badda dhimatay ay iftiiminayaan, marka loo eego aragtiyada Esseniyyiinta in saddexdan qof ay ahaayeen saddex qaab oo Masiixu koobsanayay. Sidoo kale waxa xiiso leh, in kuwo ka mid ahaa kaniisaddi hore ay rumaysanayeen Eliyaas oo iman doona Imaatinka Labaad ee Masiixa ka hor (Chrysostom, Jerome, Gregory, iyo Augustine).

1:26 “Anigu waxaan dadka ku baabtiisaa biyo” isagu dadka kuma baabtiisu doono biyo, laakiinse sida ka muuqata aayadda 33 waxa uu ku baabtiisayaa “Ruuxa.”

☐ **“Iaakiin dhexdiinna waxaa jooga mid”** Waxa jira kala duwanaansho xagga qoraallada ah oo la xidhiidha falka “jooga.” UBS⁴ ku waxa uu fal buuxa kusoo dhex aroorinayaa “B.”

Bruce M. Metzger ayaa sheegaya in falka ebyoonka ah uu yahay qaabka uu caanka ku yahay Yooxanaa, waxaana lagu dabaqi karaa erayada Cibraaniga ah ee “waxa jira Mid dhexdiiga jooga” (p. 199).

1:27 “kan aanan istaahilin inaan yeelmaha kabtiisa furo” middani waxa ay tilmaamaysaa shaqada addoonka een istaahilin inuu furo yeelmada kabaha sayidkiisa marka uu guriga soo galo (shaqada ugu yar ee addoonku uu qaban karo). Yuhuudda rabbaaniyiinta ayaa sheegay in xerta Rabbiska ay doonistoodu noqoto qabashada wax walba oo ah xitaa ta lamidka ah midda uu addoonku ku rabo inuu kabaha sayidkiisa ku furo. Sidoo kale waxa jira soo jeedin aan la magacaabin oo ah bixinta kabaha iyo in la dhigo meesha u gaarka ah ee loogu talo galay. Tani haddaba waxa weeyi tusaalaha ugu wayn ee is hoosaysiinta.

1:28 “Beytaniya” Tarjumaadda King James Version waxa uu qoraya magaca ah “Bethabara” (MSS a², C²). Waxa ay tani ku timid tarjumayaasha KJV oo rumaystay fahankii qaldanaa ee Origen oo uu ugu magac daray magacii magaalada. Akhriska ama dhawaaqa saxda ahina waxa weeyi Beytaniya (Bodmen Papyrus, P⁶⁶) – mana aha midda koonfurta ka xigta Yerusaaalem (11:18), laakiin waa magaalo dhinaca kale ka saaran Jerikoo, waana marka laga tallaabo Webi Urdun (dhinaca bari).

☐ **NASB (UPDATED) TEXT: 1:29-34**

²⁹Maalintii labaad Yooxanaa wuxuu arkay Ciise oo ku soo socda, oo wuxuu yidhi, Bal eega Wanka Ilaah ee dembiga dunida qaadaya. ³⁰Kanu waa kii aan idhi, Waxaa iga daba imanaya nin iga horreeyey waayo, hortay buu jiray. ³¹Anigu ma aan aqoonin isaga, laakiin inuu Israa iil u soo muuqdo sidaa daraaddeed ayaan u imid anigoo dadka biyo ku baabtiisa. ³²Yooxanaa waa marag furay isagoo leh, Waxaan arkay Ruuxa oo samada uga soo degaya sidii qoolley oo kale, wuuna dul joogsaday isagii. ³³Anigu ma aan aqoonin isaga, laakiin kii ii soo diray inaan dadka biyo ku baabtiiso, wuxuu igu yidhi, Kii aad ku aragtid Ruuxa oo ku soo degaya oo ku dul joogsanaya, kaasu waa kan dadka ku baabtiisa Ruuxa Qoduska ah. ³⁴Anigu waan arkay, waana u marag furay in kanu yahay Wiilka Ilaah.

1:29 “Bal eega Wanka Ilaah” Ciiddii kormaristu may fogayn (2:13). Sidaasi darteedna, middani waxa ay tilmaamaysaa wanka oo calaamad u ahaa kasoo samata bixintii (badbaadada) Masar (Baxniintii 12). Yooxanaa sidoo kale dhimashadii Ciise waxa uu ku sugayaa ciidda Kormarista markii la gawrici jiray wanka. Si kastaba ha ahaatee, waxa jiray fasiraado kale:

1. Waxa laga yaabaa inay sheegayso Adeegaha Silcaya ee Ishacyaah 53:7
2. Waxa laga yaabaa inay sheegayso wanka madax furashada (Bilowgii 22:8)

3. Waxa laga yaabaa inay sheegayso wixii maalin walba macbadka Ilaah dartiis loogu bixin jiray (Baxniintii 29:38-46).

Sida ay doontaba ha noqoto waxa ay ahayd ujeeddo laga leeyahay sadqaynta wanka lasoo diray (Markos 10:45).

Tusaalahan xooggan ee Ciise dhimashadiisa lagu tilmaamay weligiis muu adeegsan Bawlos, laakiin Yooxanaa ayaa si dhif ah u adeegsaday (1:29, 36; sidoo kale firso Falimaha Rasuullada 8:32 iyo 1 Butros 1:19). Erayada Giriigga ah ee “wan yar” (waxa uu u yaryahay da’diisa oo ahayd hal sano jir, oo ahayd da’da caadiga ah ee xoolaha la sadqaynayo). Eray ka duwan ayaa Yooxanaa uu ku adeegsaday 21:15 iyo siddeed iyo labaan jeer oo uu ku dhex adeegsaday Muujintii.

Waxa jirta suurto galnimo kale oo dheeraada oo ku saabsan sawirka Yooxanaa Baabtiisaha: qaab suugaan ahaaneed, halkaasoo “wanku” uu yahay dagaal yahan guulaysta. Dhinaca sadqayntu ilaa hadda waa ay joogtada, laakiin wanka xaaladdiisu waa ay fiicantahay (Muujintii 5:5-6, 12-13).

▣ **“ee dembiga dunida qaadaya.”** Erayga ah “qaadaya” waxa loogala jeedaa “qaadis iyo fogayn.” Falkani waxa uu aad uula mid yahay fikirkii la xidhiidhay “orgiga” sida ku sugan Laawiyyintii 16. Xaqiiqadu markaas waxa ay tahay, in denbigii dunida uu wanku xanbaaran doono oo shaqadiisa tahay (aayadda 9; 3:16; 4:42; 1 Timoteyos 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; 2 Butros 3:9; 1 Yooxanaa 2:1’ 4:14). U firso denbigu isaga oo ah keli, oon jamac ahayn. Ciise haddaba, waxa uu la tacaalay dhibaataadii “denbiga” ee dunida.

1:30 “iga horreeyey waayo,” waxa markale lagu soo celiyay aayadda 15 xoojin aawadeed. Waxa ay haddaba middani markale xoojinaysaa sii jirtaankii hore iyo Ilaahnimada Masiixa (Yooxanaa 1:1, 15; 8:58; 16:28; 17:5, 24; 2 Korintos 8:9; Filiboy 2:6-7; Kolosay 1:17; Cibraaniyada 1:3).

1:31 “inuu Israa iil u soo muuqdo” Waa erayo guud ahaan uu adeegsado Yooxanaa (2:11; 3:21; 7:4; 9:3; 17:6; 21:14; 1 Yooxanaa 1:2; 2:19, 28; 3:2, 5, 8; 4:9), laakiinse waxa ay dhif ku tahay injiillada kale, waxaanay ka muuqanaysaa oo keliya Markos 4:22. Waxa ay erayga Cibraaniga ah u dhigantaa “in la aqoonsado,” taasi oo ka hadlaysa xidhiidh weheshi ah oo dhow isla markaasna ka badan xaqiiqo wax laga ogyahay oo keliya. Haddaba, Yooxanaa baabtiiskiisa ujeedadiisu waxay ahayd labo waxyaalood: (1) inuu dadka diyaariyo iyo (2) inuu muujiyo Masiixa.

Falka ah “muuqdo” (*phaneroō*) waxa ay uu u dhigmaa “muujin” (*apokaluptō*) qoraallada Yooxanaa. Ciise waxa uu si muuqata u keenaa iftiinka/aragtida qofka iyo farriinta Ilaah!

1:32-33 waxa ay markale xoojinayaan xaqiiqada ah in Yooxanaa Baabtiisuhu arkay Ruuxa oo kusoo degaya isla markaasna ku sugnaanaya Ciise.

1:32 “Ruuxa oo samada uga soo degaya sidii qoolley oo kale” waxa ay ahayd middani Ishacyaah (cutubyada 40-66) siduu u sheegay in lagu aqoonsan karo Masiixa (Ishacyaah 42:1; 59:21; 61:1). Haddaba middan macnaheeda loogalama jeedo, in Ciise aanu markii hore Ruuxu ku jirin, laakiinse waxa ay ahayd calaamad gaara oo qalabayn ah isla markaasna Ilaah doortay. Calaamaddanina ugu asal ahaan umay socon Ciise, Laakiin waxay u socotay Yooxanaa Baabtiisaha.

Yuhuuddu waxay haysteen labo casri oo aragtidooda ku salaysnaa (Eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 2:17), waxayna kala ahaayeen casriga sharka ah ee xaadirka ahaa iyo casriga xaqnimada ee iman doonta. Casriga cusub waxa loogu magac daray casriga Ruuxa. Muujintani haddaba waxa ay Yooxanaa Baabtiisaha u sheegaysay (1) in kani yahay Masiixa iyo (2) in casrigii cusbaa soo iftiimay.

▣ **“qoolley”** middan waxa loo adeegsaday

1. Iyadoo calaamad u ahayd rabbaaniyiintii Israa’iil (Hoosheeca 7:1)
2. Iyadoo Ruuxa ku sheegaysa shimbir dheddiga oo abuurka dul joogta, waana sida ku sugan Targumiska Bilowgii 1:2.
3. Iyadoo xagga Faylooga calaamad u ahayd xikmadda
4. Iyada oo tusaale hoose u ahayd Ruuxa imanayay (Ruuxuna maaha shimbir)

▣ **“joogsaday”** Eeg Mawduuca Gaarka ah: 1 Yooxanaa 2:10

1:33 “Anigu ma aan aqoonin isaga” middani waxa ay tilmaamaysaa in Yooxanaa Baabtiisuhu aanu ogsoonay ama aanu garanaynin ciise inuu yahay Masiixa, laakiin loogalama jeedo inaanu gebi ahaantiisaba aqoonsanayn. Qaraabo ahaan dabcan way kulmeen amaba waxa ay ku kulmeen goobaha cibaadada.

▣ **“kii ii soo diray inaan dadka biyo ku baabtiiso, wuxuu igu yidhi”** Ilaah Yooxanaa waxa uu ula hadlay sidii uu nebiyada Axdiga Hore uula hadli jiray oo kale. Waxay ahayd in Yooxanaa uu Masiixa ku aqoonsado shuqulladan gaarka ah ee ahaa kuwii ku dhici doonay Baabtiiskiisa.

Yooxanaa baabtiiskiisu waxa uu soo jeediyay dareenka hoggaamiyayaashii diinta, sidaasi darteedna gudi ka socday Yerusaleem (aayadaha 19-28) ayaa waxa ay rabeen inay ogaadaan cidda awoodda u siisay inuu wax baabtiiso. Haddaba, Yooxanaa awooddaas waxa uu ku tilmaamayaa Ciise. Baabtiiska Ciise ee ah kan Ruuxu waxa uu ka wayn yahay kan Yooxanaa ee ah biyaha. Ciise baabtiiskiisii lagu baabtiisay biyuhu waxa uu calaamad u noqon doonay baabtiiska Ruuxa ee la socda da’da cusub!

▣ **“kaasu waa kan dadka ku baabtiisa Ruuxa Qoduuska ah”** Marka la eego 1 Korintos 12:13 waxa fikirkani u muuqdaa in qofka arrintan lagu sameeyaa ay tahay inuu ka mid noqonayo qoyska Ilaah. Ruuxu rumaystaha cusub waxa uu garadsiiyaa denbiga, waxaanu ku qanciya Masiixa (Yooxanaa 16:8-13). Eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 2:20.

1:34 “Anigu waan arkay, waana u marag furay” Waa fal dhammays tiran oo isla markaasna shaqaynaya kaasi oo tusinaya fal tegay oo gebogebo leh isla markaasna sii soconaya. Waxa ay middani aad uula simantahay 1 Yooxanaa 1:1-4.

▣ **“in kanu yahay Wiilka Ilaah”** Waxa laga yaabaa in lala yaabo haddii erayga Giriigga ah ee *pais*, kaasi oo caadi ahaan loo tarjumay “adeege,” kaasi oo ku sugan LXX isaga oo ka tarjumaya erayga Cibraaniga ah (*ebed*, BDB 712), in asalkiisu noqdo “Wiil.” Haddii sidaas ay tahay Ishacyaah 53 (ku sheegaya “wanka” Ilaah 1:29) waa mid loogu noqon karo Axdiga Hore isaga oo bedalaya Daanyeel 7:13. Ciise waxa weeye Wiilka iyo Adeegaha labadaba! Rumaystayaasha waxa uu u bedeli doonaa “ilmo,” ee maaha “adeege”!

Magacan mid la mida waxa Yooxanaa 1:49 ku dhex adeegsaday Nataana’eel. Sidoo kale waxa Matayos 4:3 ku dhex adeegsaday Shaydaanka. Haddaba, waxa jira qoraal gacmeedyada Giriigga farqi u dhexeeya oo laga helayo MSS P⁵ iyo a waxaanay dhigayaan “Ka la doortay ee Ilaah” halkii ay ka ahayd “Wiilka Ilaah” (UBS⁴ waxa uu dhigayaa “Wiilka Ilaah” waxaanu ku dhigayaa “B”). Erayada ah “Wiilka Ilaah” waxa guud ahaan ay ka muuqanayaan oo adeegsanaya Yooxanaa. Laakiin, haddii qof uu raaco waxyaalaha ku saabsan dhaleecaynta qoraalka, markaa erayada aan caadiga ahayni waa asal waxaana markaas jira suurta gal inay tahay iyadoo ay jiraan tarjumaado kale oo isku beddel ah inkasta oo markhaatiga qoraal gacmeedyadu xadaysan yahay. Gordon Fee ayaa farqiga u dhexeeya qoraalka waxa uu ku falaqaynayaa maqaalkiisa “The Textual Criticism of the New Testament” pp. 419-433, kaasi oo ku sugan *The Expositor’s Bible Commentary*:

“Yooxanaa 1:34, Yooxanaa Baabtiisuhu ma waxa uu ku yidhi, ‘kani waa Wiilka Ilaah’ (KJV, RSV) mise wuxuu yidhi ‘Kani waa Kii Ilaah Doortay’ (NEB, JB)? Daliilka MS ku waa uu ku qaybsan yahay xitaa qoraaladii hore noocyadooda. ‘Wiil’ waxa laga helayaa markhaatiga Aleksandariyaanka (P⁶⁶, P⁷⁵, B, C, L cop^{bo}) iyo sidoo kale OL (aur, c, flg) iyo waraaqda markhaatiyada Siiriyaaga, halka ‘ka la doortay’ uu taageeraya Aleksandariyaanka P⁵, a, cop^{sa} iyo sidoo kale OL MSS a, b, e, ff², iyo Siiriyaaga Hore.

“ugu dambaynta su’aasha waa in lagu go’aansado asalkeeda. Xagga suurta galnimada qoraallada ah, hal wax ayaa caddaan ah: kala duwanaanshuhu waa badheedh, mana aha wax aan la filanayn ku dhacay (Bart D. Ehrman kitaabkiisa *The Orthodox Corruption of Scripture*, pp. 69-70). Laakiin culimadii qarnigii labaad ma ku sameeyeen is bedel qoraallada taageeraya wiilnimada, mise culimiada xagjirka ah, ayaa suurtagalnimada ‘ka la doortay’ u adeegsaday wiilnimo, iyaga oo sababo xag jir ahaaneed arrintaas u sameeyay? Xagga suurto galnimada, ugu dambaynta waxa ay umuuqdaan kuwo isku mida, gaar ahaan maadaama oo ‘Wiilka’ aan meelna Injiilka dhexdiisa loogu beddelin waxyaalo kale oo ku haboon aragtida wiilnimada.

“laakiin go’aanka kama danbaysta ahi waa inuu koobsado is waafaqid. Maadaama oo Yooxanaa Baabtiisuhu uu ahaa mid Masiixa wax kasi sheegaya, su’aashu markaas waxa ay muujinaysa masiixa waxa khuseeya midkood sida ku sugan Sabuurka 2:7 amaba Ishacyaah 42:1. Iyada oo la raacayo iftiiminta ujeedada wanka ee Yooxanaa 1:29, waxa si hubaal loogu doodi karaa ‘Ka Ladoortay’ oo ku haboonaan kara macnaha Injiilka” (pp. 431-432).

NASB (UPDATED) TEXT: 1:35-42

³⁵Mar kale maalintii dambe Yooxanaa waa taagnaa isaga iyo laba xertiisa ahayd. ³⁶Oo wuxuu arkay Ciise oo socda, markaasuu yidhi, Bal eega Wanka Ilaah. ³⁷labadii xerta ahaydna way maqleen isagoo hadlaya, wayna raaceen Ciise. ³⁸Markaasaa Ciise soo jeestay, waana arkay iyagoo raacaya, kolkaasuu ku yidhi, Maxaad doonaysaan? Waxay ku yidhaahdeen, Rabbi (waxaa lagu fasiraa Macallin), Xaggee baad deggan tahay? ³⁹Wuxuu ku yidhi, Kaalaya oo arka, Markaasay yimaadeen oo arkeen meeshuu degganaa, wayna la jooheen maalintaas. Goortaa waxay ahayd abbaaraha saacaddii tobnaad. ⁴⁰Mid ka mid ah labadii maqashay Yooxanaa oo raacday, wuxuu ahaa Andros, Simoon Butros walaalkiis. ⁴¹Isagu wuxuu hortii doonay walaalkiis Simoon oo ku yidhi, Waannu helnay Masiixa (kan lagu fasiro Kristooska). ⁴²Markaasuu wuxuu u geeyey Ciise. Ciisena intuu eegay ayuu wuxuu ku yidhi. Adigu waxaad tahay Simooll ina Yoonis. Waxaa lagu odhan doonaa Keeyfa (oo fasirkiisu yahay Butros).

1:35 “laba xertiisa ahayd” Markos 1:16-20 ayaa wuxuu u muuqdaa inuu ka duwanyahay diiwaan gelinta labadan xerta ah. Waxa aan la hubin xidhiidhkii hore uu u dhexeeyay Ciise iyo xertiisii ahayd reer Galiilee. Waxa jiray ayaamihii Ciise heerar khaas ah oo anshax ah isla markaasna khuseeyay ahaanshanimada rabbaani dhammays tiran. Nidaamyadan waxa laga heli karaa maraajicda rabbaaniyiinta, laakiinse kuma tirsana waxyaalah Injiilku diiwaan gelinayo. Haddaba, labadan xerta ahaa waxa lagu sheegay Andros (aayadda 40), iyo Rasuul Yooxanaa (oo marqudha aan isku dhex magacaabayn Injiilka).

Erayga xer waxa macnihiisu noqon karaa (1) arday ama (2) raacsane. Magacani waxa uu ahaa mid lagu magacaabay kuwii wakhtigii hore Ciise u rumaystay inuu yahay Masiixa isla markaasna ahaa xertiisa. Waxa muhiim ah markaas in fiiro loo yeesho, Axdiga Cusub oo ugu magac daraya xer, oon ahayn wax kale (Matayos 13; 28:18-20). Masiixiyaddu waa go’aan ugu horrayn ah (towbad keen iyo rumaysad), oo ay la socdaan go’aan addeecitaan iyo adeeg ah oo kala go’ lahayn. Masiixiyaddu maaha damaanad qaad lagaga badbaadayo naarta amaba xaashi lagu galayo janada, laakiinse waa xidhiidh maalin walba ah oo lala yeelano Ciise.

1:37 “labadii xerta ahaydna way maqleen isagoo hadlaya,” Yooxanaa Baabtiisuhu tilmaamay oo farka ku fiiqay Ciise (3:30).

1:38 “Rabbi (waxaa lagu fasiraa Macallin),” kani waxa uu ahaa magac qarnigii koobaad Yuhuuddu u adeegsan jireen cidda sharraxaadda ka bixisa Sharciigii Muuse iyo Hadal Dhaqameedyadii (Talmud). Macneheedu waxa uu markaas yahay “sayid.” Rasuul Yooxanaa isna waxa uu adeegsaday iyada oo u dhiganta “macallin” (11:8, 28; 13:13-14; 20:10). Xaqiiqada Yooxanaa uu ku sharxayo ereyadiisa (aayadaha 38, 41, 42) waxa ay tusinayaan inuu qoraalka u samaynayay kuwa aan Yuhuudda ahayn.

▣ **“Xaggee baad deggan tahay?”** middani waxay u muuqataa qaab dhaqan ahaaneed oo ah aasaasitaanka xidhiidhka u dhexeeya macallin iyo ardaydiisa. Su’aashooda waxa laga fahmi karaa, in labadan nin doonistoodu ahayd inay wakhti dheeraada la qaataan Ciise halkii ay wadada ugu waydiin lahaayeen su’aalo dhawra oo keliya (aayadda 39).

Erayga *menō* (joogis/degganaan) saddex jeer ayuu kusoo dhex aroorayaa aayadaha 38, 39. Waxaanay tilmaami kartaa goob deganaansho oo jidh ahaaneed amaba ruux ahaaneed. Saddexda jeer ee la adeegsadayba waxa ay ka muuqanayaan iyagoo si kale loo adeegsaday Yooxanaa (1:1, 5; 3:3; 4:10-11; 12:32). Middani markaasi waxa ay caan ku tahay qoraallada Yooxanaa!

1:39 “Goortaa waxay ahayd abbaaraha saacaddii tobnaad” lama hubo haddii Yooxanaa uu isticmaalay goorsheegtii Roomaanka, oo ka bilaabmayay (1) 12:00 a.m. ama (2) kala badhka maalintaa, ama goorsheegtii Yuhuudda, oo ka bilaabmaysay 6:00p.m. (maqribka). Marka haddaba la is barbar dhigo Yooxanaa 19:14 iyo Markos 15:25 waxa ay u muuqataa in loogala jeedo goorsheegtii Roomaanka. Si kastaba ha ahaatee, marka la eego Yooxanaa 11:9 waxa ay u muuqataa in loogala jeedo goorsheegtii Yuhuudda. Waxa suurta gala haddaba in Yooxanaa labadaba uu wada isticmaalay, laakiin halkan waxa ay u muuqataa goorsheegtii Roomaanka #2, ama abaara 4:00 p.m.

1:40 “Mid ka mid ah labadii maqashay Yooxanaa” Qoraaga (Rasuul Yooxanaa) marnaba magaciisa kuma sheegayo Injiilka dhexdiisa (21:2). Waxa hubaala markaas suurta galnimada in labadan Yooxanaa Baabtiisaha maqlay midkood uu ahaa Yooxanaa, ina Sebedi (Matayos 4:21; Markos 1:19).

1:41

NASB “Isagu wuxuu hortii doonay walaalkiis”
NKJV, NRSV “Isagu ugu horrayntii wuxuu doonay walaalkiis”
TEV “Isaguu ugu horrayntii doonay”
NJB “Wixii ugu horreeyay ee Andros sameeyay”

Waxa jira qoraal gacmeedyo kala duwan oo saamayn ku yeeshay tarjumaadaha. Ikhtiyaarku waxa uu yahay

1. Wixii ugu horreeyay ee Andros sameeyay
2. Qofkii ugu horreeyay ee uu doonay
3. Andros wuxuu ahaa kii ugu horrayntii tegay una sheegay

▣ **“Masiixa (kan lagu fasiro Kristooska).”** Eeg fiirada gaarka ah 1:20.

1:42 “Ciisena intuu eegay” erayadu waxa ay tilmaamayaan “daymo degdaga oo taxadir ku jiro.”

▣ **“Simoon ina Yoonis.”** Waxa jira xoogaa wareera Axdiga Cusub dhexdiisa kaasi oo khuseeya Butros aabbihiis magaciisa. Matayos 16:17 dhexdiisa Butros waxa loogu yeedhay “ina Yoonis” (*Iōnas*), laakiinse tarjumaadaha Ingiriisida halkan waxa loogu yeedhay “ina Yooxanaa” (*Iōannēs*). Magaca Yooxanaa waxa laga helayaa MSS P⁶⁶, P⁷⁵, a iyo L. MS B oo la mida laakiinse wata hal “n” oo keliya (*Iōanēs*). Magaca Yoonis waxa uu kusoo dhex aroorayaa MSS A, B³, K iyo badanaa qoraal gacmeedyada kale ee Giriigga. Waxay u muuqataa markas in jawaaba cad aan loo haynin su’aashan, tarjumayaashuna siyaabo kala duwan ayay u kala qoraan magacyada Aramaatiga ah.

Michael Magill, ayaa kitaabkiisa *The New Testament Transline*, p. 303, waxa uu ku leeyahay, ‘Jonah’ iyo ‘John’ waxa laga yaabaa inay yihiin isku dhihid kala dhigid iyaga oo la mida magaca Cibraaniga ah ee ‘Simon’ iyo ‘Simeon.’”

▣ **“Waxaa lagu odhan doonaa Keeyfa (oo fasirkiisu yahay Butros)”** erayga Keeyfa waa eray Aramaati ah oo lagu magaacbo dhagaxa (*kepa*), dhiggiisa Giriigga wuxuu noqonayaa *kephas*. Magacani haddaba waxa uu ka tarjumayaa xasilloonaanta iyo xoogganaanta shakhsigu leeyahay.

Waxa ay middani ka mid tahay, faallooyinka qoraaga Injiilku uu gacan kaga gaysanayo sharraxaadda noloshii iyo waxbaristii Ciise, taasi oo uu u sharraxayo akhristayaashii aan Yuhuudda ahayn. Waxa xiiso leh labada eray ee ka daba imanaya oo muhiim u ah fasiraadda kitaabku, inay ka muuqanayaan cutubkan.

1. exegesis, oo ah sheegis, waxaana lagu adeegsaday aayadda 1:18
2. hermeneutics, sharraxitaan, fasiritaan, tarjumaad, waxaana lagu adeegsaday 1:42.

NASB (UPDATED) TEXT: 1:43-51

⁴³Maalintii labaad wuxuu doonayay inuu Galili tago, oo wuxuu helay Filibos. Ciisena wuxuu ku yidhi, I soo raac. ⁴⁴Filibos wuxuu ahaa reer Beytsayda taas oo ah magaaladii Andros iyo Butros. ⁴⁵Markaasaa Filibos wuxuu doonay Nataana el oo ku yidhi, Waxaannu helnay kii Muuse sharciga ku qoray wax isaga ku saabsan. oo nebiyadiina ay qoreen wax isaga ku saabsan, waana Ciisihii reer Naasaret oo ah ina Yuusuf. ⁴⁶Nataanael wuxuu ku yidhi. Ma wax wanaagsan baa ka iman kara Naasaret? Markaasaa Filibos wuxuu ku yidhi. Kaalay oo arag. ⁴⁷Ciise wuxuu arkay Nataana el oo ku soo socda. oo wuxuu ku yidhi, Bal eeg. kanu waa mid reer Israa iil oo run ah oo aan khiyaano lahayn. ⁴⁸Markaasaa Nataana el wuxuu ku yidhi. Xaggee baad igu tiqiin? Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi. Intaall Filibos kuu yeedhin, markaad geedkii berdaha hoostiisa joogtay, ayaan ku arkay. ⁴⁹Kolkaasaa Nataana el u jawaabay oo ku yidhi, Macallimow, waxaad tahay Wiilka Ilaah, oo waxaad tahay boqorkii Israa iil. ⁵⁰Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Ma waxaad u rumaysatay odhaatinkii aan kugu idhi. Geedka berdaha hoostiisa ayaan kugu arkay? Waxaad arki doontaa wax waxyaalahaas ka waaweyn. ⁵¹Mar kaasuu ku yidhi, Runtii. runtii. waxaan idinku iieyahay, Waxaad arki doontaan samadoo furall iyo malaa igaha Ilaah oo kor u kacaya oo ku soo degaya Wiilka Aadanaha.

1:43 “Maalintii labaad” Yooxanaa waxa uu Injiilka kusoo darayaa calaamado taariikh ahaaneed (1:29, 35, 43; 2:1, iwm). Macnaha guud (1) waxa uu ka bilaabmayaa aayadda 19, oo noqon karta maalintii ugu horraysay; (2) aayadaha 29, 35, 43 waxa weeyi “maalintii labaad”; iyo (3) 2:1 oo ah “maalintii saddexaad.”

▣ **“wuxuu doonayay inuu tago”** Yooxanaa waxa uu diiwaan gelinayaa wakhtiyadii hore ee ugu horraysay shaqadii Ciise ka waday Yahuudiya, taasina waa mid aanay injiillada kale diiwaan gelinaynin. Yooxanaa Injiilkiisu waxa uu diiradda saarayaa shaqadii Ciise ee Yahuudiya, gaar ahaan Yerusaleem. Haddaba, halkan waxa suurto gal ahayd inuu u socday Galili isagoo u socda arooskii kaana (Yooxanaa 2).

▣ **“I soo raac.”** Waa fal wakhti xaadirkaas jooga amarna bixinaya, taasina waxay ahayd yeedhitaankii rabbaaniyiinta si loo ahaado xer buuxa. Yuhuudda markaas waxa u dejisnaa sharciyo xidhiidhkan isaga ah qeexayay.

1:44 “Filibos wuxuu ahaa reer Beytsayda” magaaladan magaceeda macnihiisu waxa weeyi “hoygii kalluumaysiga.” Waxa haddaba ahayd meeshii ay deganaayeen Andros iyo Butros.

1:45 “Nataana el” Waa magaca Yuhuudi ah macnihiisuna yahay “Ilaahbaa bixiyay.” Isaga magac looguma yeedhin injiillada kale, sidaasi darteedna culimada casriga ahi waxay u malaynayaan inuu ahaa ka lagu magacaabay “Bartolomayos,” laakiinse shakibaa ku jira.

MAWDUUC GAAR AH: JADWALKA MAGACYADII RASUULLADA

	Matayos 10:2-4	Markos 3:16-19	Luukos 6:14-16	Fal 1:12-18
Kooxda Hore	Siimon(Butros)	Simon (Butros)	Simon (Butros)	Butros
	Andros (Butros walaalkii)	Yacquub (Sebede)	(ina Andros walaalkii)	Yooxanaa
	Yacquub (Sebedi)	(ina Yooxanaa (Yacquub walaalkii))	Yacquub	Yacquub
	Yooxanaa (Yacquub walaalkii)	Andros	Yooxanaa	Andros
Kooxda Labaad	Filibos	Filibos	Filibos	Filibos
	Bartolomayos	Bartolomayos	Bartolomayos	Toomas
	Toomas	Matayos (cashuur qaadihii)	Matayos	Bartolomayos
	Matayos (cashuur qaadihii)	Toomas	Toomas	Matayos
Kooxda Sadexaad	Yacquub (Alfayos)	(ina Yacquub Alfayos)	(ina Yacquub Alfayos)	(ina Yacquub Alfayos)
	Tadayos	Tadayos	Siimon (Qiirroleh)	Siimon (Qiirrole)
	Simon (reer Kaana)	Simon (reer Kaana)	Yuudas (Yacquub)	(ina Yuudas (Yacquub))
	Yuudas (Iskariyot)	Yuudas (Iskariyot)	Yuudas (Iskariyot)	

▣ “sharciga ku qoray wax isaga ku saabsan. oo nebiyadiina ay qoreen” middani waxa ay tilmaamaysaa labo ka mida saddex qaybood uu sharciga Yuhuuddu ahaa: Sharciga, nebiyada, iyo qoraallada (kaasi oo lagu falaqaynayo Jamniya 90 C.D.). Waxa ay ahayd erayo lagu cabiro gebi ahaanba Axdiga Hore.

▣ “Ciisihii reer Naasaret oo ah ina Yuusuf” middan waa in lagu fahmo iftiiminta adeegsiga Yuhuudda. Ciise waxa uu ku noolaaday Naasaret iyadoo aabbihiisa xagga sharciguna ahaa Yuusuf. Middani kama soo horjeedo dhalashadii Ciise ku dhashay Beytlaxam (Miikaah 5:2), amaba inuu bikrad ka dhashay (Ishacyaah 7:14). Eeg Mawduucan Gaarka ah ee soo socda.

MAWDUUC GAAR AH: CIISAHA NAASAREET

Waxaa jira dhawr erey oo kala duwan oo Giriig ah oo lagu isticlaay Axdiga Cusub dhexdiisa si Ciise loogu muujiyo si cad kan uu yahay.

A. Ereyada Axdiga Cusub

1. Naasareet – Magaalada ku taal Galiili (cf. Luukos 1:26; 2:4,39,51; 4:16; falimaha Rasuullada 10:38). Magaaladan laguma sheegin qoraalladii oo dhan laakiin, fariimihii dambe ayaa laga helay.
2. In Ciise uu Naasareet la yimaado wax amaan ah (cf. Yooxanaa 1:46). Calamadda iskutallaabta Ciise ee ku jirtay meeshan magaceeda ayaa waxa ay calamad u ahayd nacaybka Yuhuudda.
3. *Nazarenos* - waxay sidoo kale u la xidhiidhtaa booska juquraqafi ahaaneed (cf. Luukos 4:24; 24:19).
4. *Nazoraios* - waxay u taagan tahay magaalo, sidoo kalena waa cayaar ku aaddan sida Cibraaniga uu ku yahay ereyga Masiixi “Laan” (*netzer*, cf. Ishacyaah 4:2; 11:1; 53:2; Yeremyaah 23:5; 33:15; Sakariyaah 3:8; 6:12). Luukos Ciise ayuu middan u adeegsanayaa sida ku jirta 18:37 iyo Falimaha Rasuullada 2:22; 3:6; 4:10; 6:14; 22:8; 24:5; 26:9).

B. Adeegsiyadii taariikh ahaaneed ee ka baxsanaa Axdiga Cusub.

1. Waxay muujinaysaa Yuhuud (ka hor Masiixiyiinta) in ay koox dhaxaltooyo (Aramaatiga *nasorayya*).
2. Waxaa loo adeegsaday goobaha Yuhuudda si loo muujiyo rumaystayaasha ku jira Masiixa (cf. Falimaha Rasuullada 24:5,14; 28:22, *nosri*).
3. Wuxuu noqday ereyga tooska ah ee lagu muujiyo rumaystayaasha sida kaniisadihii Suuriya ee (Aramyga). “Masiixi” waxaa laga dhex adeegsanayey kaniisadihii Giriigta si loogu yeero rumaystayaasha.
4. Waqti ka mid ah dhiciddii Yerusaaalem, Faarisiintii ayaa waxay dib isugu abaabuleen Jamnia waxayna dejiyeen in uu jiro farqi u dhexeeya sunnagooqga ito kaniisadda. Tusaale ka mid ah nooca inkaarta looga soo hor jeedo Masiixiyiinta ayaa laga helayaa “Siddeed iyo toban saadaalinood” oo ku jira *Berakoth* 28b-29a. oo rumaystayaasha ugu yeeraya “Nazarenes” “Naasariiniyiinta.”
5. “Mar qura Naasariiniyiinta iyo kuwa dhaxalku muuq beeleen; iyaga waxaa laga tirtiri doonaa buugga nolosha oo kua rumaysadka leh lagulama qori doono.”
6. Waxa adeegsaday Justin Martyr, *Dial* 126:1, kaaso adeegsaday Ishaacyaah *netzer* kiisa Ciise.

C. Aragtida qoraaga

Waxaa iga yaabiyey dhawaaqyo badan oo uu ereygu leeyahay, inkasoo aan garanayo in aan Axdigii Hore loogu maqlin sida kitaabka (Yashuuca) dhexdiisa uu dhawr dhawaaq oo kala duwan ugu leeyahay luqada Cibraaniga. Waxyaalahan soo socda waxa ay igu sababeen inaan hubi waayo macnaheeda saxda ah:

1. Xidhiidhka dhow ee uu la leeyahay erayada la xidhiidha Masiixa ereyga “laan” (*netzer*) ama erayga la siman *nazir* (mid quduus ku ah ballan)
2. Xidhiidhka diidmada ah ee GaliiliMarka
3. Waa yar yahay ama maba jiro dareen ay dadkii ay isku xilliga ahaayeen ka qabeen magaalada Naasareet ee Galiili ku taalay.
4. Iyadoo kasoo baxday afkii jinniga markii uu lahaa (“Ma waxaad u timid in aad na burburiso?”)
5. Faahfaahin dhammays tiran oo la xidhiidha ereyadan, ka eeg Colin Brown (ed.), *The new International Dictionary of New Testament Theology*, vol. 2, bogga 346 ama Rymond E. Brown, kitaabkiisa Birth, pp. 209-213, 223-225.

1:46 “Nataanael wuxuu ku yidhi. Ma wax wanaagsan baa ka iman kara Naasaret?” Waxa caddayd in Nataana’el iyo Filibos ay ogsoonaayeen waxsii sheegyadii Axdiga Hore; Masiixu waxa uu ka iman rabay Beytlaxam (Miiikaah 5:2) oo u dhowayd Yerusalaam, laakiinse aan u dhowayn Naasaret dii Galiili ee kuwa aan Yuhuudda ahayn deganaayeen, laakiinse Ishacyaah 9:1-7 ayaa middan laga fahmi karaa!

1:47

NASB, NKJV,

NRSV

TEV

NJB

“oo aan khiyaano lahayn”

“wax been ahi isaga kuma jiraan”

“kaasoo aan lahayn wax khiyaano ah”

Macneheedu waxa weeyaan nin toosan oo aan lagu arkayn wax madmadow ah (Sabuurka 32:2), waxaanu matalayaa runta dadkii la doortay ee Israa’iil.

1:48 “Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi. Intaall Filibos kuu yeedhin, markaad geedkii berdaha hoostiisa joogtay, ayaan ku arkay.” Waxa halkan ka cad in Ciise uu adeegsaday aqoontiisa dabiicada ka sarraysa (2:24-25; 4:17-19, 29; 6:61, 64, 71; 13:1, 11, 27, 28; 16:19, 30; 18:4) si uu Nataana’el u siiyo calaamad muujinaysa inuu yahay Masiixa.

Waxa adag sida lagu fahmo sida ay u shaqaynaso Ciise dabiicaddiisa Ilaahnimada iyo midaa aadananimadu. Aayadaha qaar waxa aan la hubin, in Ciise uu adeegsanayay awood “dabeecadda ka sarraysa” ama kartida aadanaha. Halkan waxa ka muuqanaysa inay ahayd karti “dabeecadda caadiga ah ka sarraysa.”

1:49 “Kolkaasaa Nataana el u jawaabay oo ku yidhi, Macallimow, waxaad tahay Wiilka Ilaah, ... boqorkii Israa iil” fiiro u yeelo iyada oo labada magacba ay yihiin kuwo ka mida magacyadii Masiixa (Sabuurka 2). Xertan ugu horraysay waxa ay Ciise ku fahmeen waxyaalihii lagu garanayay Masiixa ee Yuhuudii qarnigii koobaad yaqaaneen. Laakiinse, iyagu si buuxda shakhsiyaddiisa iyo shaqadiisa umay fahmin, isaga oo Adeegaha Silcaya ahaa (Ishacyaah 53) ilaa sarakicista dabadeed.

1:51

NASB

NKJV

NRSV

TEV

NJB

“Runtii. runtii. waxaan idinku ieeyahay,”

“hubaashii, waxaan idinku leeyahay”

“run ahaantii, waxaan idiin sheegayaa”

“waxaan idiin sheegayaa runta”

“run ahaantii”

Macno ahaan waxa weeyi “Aamiin! Aamiin!” Ciise ereyadan uu kusoo celcelinayo waxa laga heli karaa oo keliya Injiilka Yooxanaa, waxaanay ka muuqanaysaa shan iyo labaatan jeer. “Aamiin” waa erayga Cibraaniga ah ee “*emeth*” oo macneheedu yahay “adkaado” (Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:14). Axdiga Hore dhexdiisana waxa loogu adeegsaday iyadoo tusaale u ah xasilloonida iyo runsheegnimada. Waxaana loo tarjumi karaa “iimaan” ama “rumaysad lahaansho.” Si kastaba ha ahaatee, waxa loo adeegsaday ansixin. Heerkan ay taagnayd, ayaa haddaba si gaara waxa loogu adeegsaday, in fiiro loo yeesho muhiimadda Masiixa iyo runsheegnimadiisa uu ku muujinayo waxyiga YHWH (1:51; 2:3, 5, 11; 5:19, 24, 25; 6:26, 32, 47, 53; 8:34, 51, 58; 10:1, 7; 12:24; 13:16, 20, 21, 38; 14:12; 16:20, 23; 21:18).

Fiiro u yeelo iyadoo jamac loo beddelo (magac uyaalka iyo falka). Waxa loogala jeeday dhammaanba dadkii goobtaas joogay.

MAWDUUC GAAR AH: AAMIIN

I. AXDIGA HORE

A. Erayga “Aamiin” waa eray Cibraani ah oo u taagan

1. “run” (*emeth*, BDB 49)
2. “runsheegnimo” (*emun, emunah*, BDB 53)
3. “rumaysad” ama “rumaysad yeelasho”
4. “kalsooni” (*dmn*, BDB 52)

B. Waa eray loo adeegsan karo xaallada qofka sugan. Kasoo horjeedkeeduna waxa uu noqon karaa waxa aan sugnayn (Sharciga Kunoqoshadiisa 28:64-67; 38:16; Sabuurka 40:2; 73:18; Yeremyaah

23:12) iyo (Sabuurada 73:2). Waxay tilmaamasaa rumaysad iyo wax la isku hallayn karo (Bilowgii 15:16; Xabquuq 2:4).

C. Adeegsiyo gaara

1. tiir, 2 Boqarrada 18:16(1 Timoteyos 3:15)
2. ballan, Baxniintii 17:12
3. xakamayn, Baxniintii 17:12
4. sugnaansho, Ishacyaah 33:6; 34:5-7
5. run. 1 Boqorradii 10:6; 17:24; 22:16; Maahmaahyadii 12:22
6. adayg 2 Taariikhadii 20:20; Ishacyaah 7:9
7. caqli gal Sabuurka 119:43,142,151,168.

D. Axdiga Hore dhexdiisa labada eray ee kale ee loo adeegsaday rumaysadka shaqaynaya waxa weeyi:

1. *bathach*, talo saarasho
2. *yra*, cabsi, tixgelin, caabudis (Bilowgii 22:12).

E. Xagga talo saarashada amaba isku hallaynta (Sharciga Kunoqoshadiisa 27:15-26; Nexemyaah 8:6; Sabuurka 41:13; 72:19; 89:52; 106:48).

F. Fahanka fiqi ahaaneed ee eraygani maaha xaqnimada aadanaha, laakiin waa Ilaah (Baxniinta 34:6; Sharciga Kunoqoshadiisa 32:4; Sabuurka 108:4; 115:1; 117:2; 138:2). Aadanaha leexday rajadooda keli ahi waxa weeyi naxariista Ilaah iyo sida uu uga dhabeeyo ballan qaadyadiisa. Kuwa aqoonta u leh Ilaah waa inay isaga oo kale noqdaan (Xabquuq 2:4). Kitaabka Quduuska ahi waa taariikh diiwaan gelinasa sida Ilaah dib ugu noolaynayo xidhiidhkiisa uu la leeyahay aadanaha (Bilowgii 1:26-27). Badbaadada ayaa u suurto gelinasa aadanaha inay xidhiidh la yeeshan Ilaah, waana sababta la inoo abuuray.

II. AXDIGA CUSUB

A. waxa loo adeegsaday gebogebaynta iyo qiritaanka runta ku jirta hadalka la sheegay (1 Korintos 14:16; 2 Korintos 1:20; Muujintii 1:7; 5:14; 7:12).

B. Adeegsiga ku xidhitaanka tukashada (Rooma 1:25; 9:5; 11:36; 16:27; Galatiya 1:5; 6:18; Efesos 3:21; Filiboy 4:20; 1 Timoteyos 1:17; 6:16; 2 Timoteyos 4:18).

C. Ciise waa kan keliya ee isticmaalay erayga (Luukos 4:24; 12:37; 18:17,29; 21:32; 23:43)

D. Waa magac loo isticmaalay Ciise Masiix sida aan ka arki karno Muujintii 3:14 (waxa kaloo suurto gala in loo adeegsaday Ilaah Ishacyaah 65:16).

Fikirka la xidhiidha rumaysad yeelashada ama rumaysadka, waxa lagu sheegay eray Giirga oo ah *pistos*, waxaana luqada Ingiriisida loogu tarjumay “trust,” “faith,” “believe.”

▣ **“idinku, idinku”** labaduba waa jamac. Ciise waxa uu la hadlayaa dhammaanba ciddii goobtaas joogtay iyaga oo metalaya aadanaha oo dhan.

▣ **“samadoo furan”** Cibraadani waxa ay ka dhex muuqanaysaa Axdiga Hore

1. Yexesqeel, Yexesqeel 1:1
2. Ciise, Matayos 3:16; Markos 1:10; Luukos 3:21
3. Stifaanos, Falimaha Rasuullada 7:56
4. Korneeliyos, Falimaha Rasuullada 7:56
5. Imaatinka Labaad, Muujintii 19:11

Waa fal ebyon oo shaqaynaya oo macneheedu yahay waxay ahaanayaan kuwo furan. Erayga “samooyin” waa jamac, maxaa yeelay luqada Cibraaniga waxay ku tahay jamac. Waxa haddaba ay tilmaami kartaa (1) Hawada ka sarraysa dhulka sida Bilowgii 1 ama (2) joogitaanka Ilaah.

MAWDUUC GAAR AH: SAMOYINKA

Erayga Axdiga Hore ku sugan ee “samooyin” hadiyo goor waa jamac (*shamayin*, BDB 1029). Eraygan Cibraaniga ah markaas macnihiisu waa “sare.” Ilaah waa uu sarreeyaa. Fikirani haddaba waxa uu ka

tarjumayaa quduusnaanta iyo sarrayntiisa.

Bilowgii 1:1 jamaca “samooyin iyo dhul” waxa looga arkayay Ilaah oo abuuray (1) hawada ku gadaaman meerahan ama (2) dariiqo lagu tilmaamayo xaqiiqada oo dhan (ruuxi ahaan iyo jidh ahaan). Fahankan aasaaska ah iyadoo lagasoo xiganaya qoraallada kale waxa ay tilmaamayeen qaybaha samada: “samada samooyinka” (Sabuurka 68:33) ama “samada iyo samada samooyinka” (Sharciga Kunoqoshadiisa 10:14; 1 Boqorradii 8:27; Nexemyaah 9:6; Sabuurka 148:4). Rabbisku waxa ay u malaynayeen inay jireen

1. Labo samo (R. Yahuudah, Hagigah 12b)
2. Saddex samo (Test. Laawiyiintii 2-3; Ascen kii Ishacyaah 6-7; Midrash Tehillim ee Sabuurka 114:1)
3. Shan samo (III Baruch)
4. Todoba samo (R. Simonb. Lakish; II Enoch 8; Ascen kii Ishacyaah 9:7)
5. Toban samo (II Enoch 20:3b; 22:1)

Dhammaan kuwan waxa loogala jeeday muujinta Ilaah uu kaga soocan yahay abuurkan iyo sarrayntiisa.

Badanaa guud ahaan tirada rabbaaniyiintu samada u adeegsan jireeni waxa uu ahaa toddoba. A. Cohen, ayaa kitaabkiisa *Everyman's Talmud* (p. 30), ayaa waxa uu leeyahay middani waxay la xidhiidhaysay xiddigiska, laakiinse waxaan u malaynayaa in tirsinka toddoba uu ahaa nambar fiican (maalmaha abuurka oo Ilaah maalintii toddobaad uu nastay sida ku sugan Bilowgii 1).

Bawlos ayaa 2 Korintos 12:2 waxa uu ku sheegayaa samada “saddexaad” (Giriig *ouranos*) isaga tilmaamaya joogitaanka boqortooyada Ilaah. Bawlos kulan shaqsi ahaaneed oo Ilaah uu la yeeshay!

▣ **“malaa igaha Ilaah oo kor u kacaya oo ku soo degaya”** kani waa hadalkii dadbanaa ee khibraddii Yacquub markii uu joogay Beytel (Bilowgii 28:10ff). Ciise waxa uu sheegayaa sidii Ilaah ugu ballan qaaday inuu Yacquub usiin doono wuxuu rabo, sidaasoo kale isna u siin doono waxa uu u baahan yahay oo dhan.

▣ **“Wiilka Aadanaha.”** Waa magacii Ciise u doortay inuu isku magacaabo. Waxay ahaayeen erayo Cibraani ah oo tilmaamaya aadanaha (Sabuurka 8:4; Yexesqeel 2:1). Laakiinse adeegsiga lagu dhex adeegsaday Daanyeel 7:13 aawadeed, waxa uu yeelanayaa tayada Ilaahnimada. Eraygani malaha dhalasho, maxaa yeelay looma adeegsanin rabbaaniyiinta. Ciise waxa uu u doortay magacan isaga oo ka tarjumayay labada dhinac ee dabiicaddiisa (aadanaha iyo Ilaahnimada, 1 Yooxanaa 4:1-3). Yooxanaa waxa uu sheegayaa Ciise oo isku magacaabaya magacan saddex iyo toban jeer.

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay ahayd sababta ay guddigii Yerusaaalem Yooxanaa u waydiinayeen, haddii uu yahay mid ka mida shakhsiyaadkii Axdiga Hore?
2. Magacow erayada Masiixa la xidhiidha ee Yooxanaa ku sheegayo Masiixa sida ku sugan aayadaha 19-30?
3. Maxay Yooxanaa iyo injiillada kale ugu kala gedisan yihiin u yeedhitaankii xerta?
4. Maxay nimankani ka fahmeen Ciise? U fiirso magacyada ay isaga ugu yeedheen (aayadda 38).
5. Muxuu Ciise naftiisa ku magaacabay? Sababtu se maxay ahayd?

YOOXANAA 2

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Arooskii Kaana 2:1-11	Biyihii loo rogay khamriga 2:1-12	Arooskii Kaana 2:11	Arooskii Kaana dhexdeeda 2:1-3 2:4 2:5 2:6-10 2:11	Arooskii Kaana 2:1-10 2:11-12
2:12		2:12	2:12	
Daahirintii Macbadka 2:13-22	Ciise oo daahiriyeey Macbadka 2:13-22	Daahirintii Macbadka 2:13-22	2:13-17 2:18 2:19 2:20 2:21-22	2:13-22
Ciise dadkoo dhan waa yaqaan 2:23-25	Ka Qalbiyada daalacda 2:23-25	2:23-25	Aqoontii Ciise u lahaa aadanaha 2:23-25	Ciise oo joogay Yeruusaaalem 2:23-25

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad

3. Baaragaraafka saddexaad

4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 2:1-11

- A. Ciise wuxuu aad uuga duwanaa hogaamiyayaashii diimaha ee wakhtigiisii. Waxa uu wax la cunay oo la cabay dadka guud ahaan. Halkii Yooxanaa Baabtiisuhu uu ka ahaa shakhsi ka gaara dadka, Ciise isagu guud ahaan waxa uu la jiray dadka.
- B. Mucjisadiisii u horraysay waxay ahayd mid maxalli ah ama qoys ahaaneed! Daryeelka iyo danaynta dadku waxa ay ahayd qaab dhaqameedka Ciise, waxaanu ka cadhaysnaa kuwii iyagu isu arkayay inay xaqyihiin ee dadka iska fogaynayay. Dadka oo mudnaanta la siiyo, oon dhaqamada gaarka ah la siinini, waxay muujinaysa xorriyaddii Ciise, ha se ahaatee, dhinaca kalena waxa ay ka ahayd mid u dabacsan waxyaalahada dhaqanku filayo.
- C. Kuwani waa toddobo ka mid ah calaamadihii/mucjisooyinkii Ciise ee Yooxanaa ku muujinayo dabeecaddii iyo awooddii Ciise (cutubyada 2-11)
1. Biyihii khamriga loo rogay (Yooxnaa 2:1-11)
 2. Bogsiintii wiilka (4:46-54)
 3. Bogsiintii ninkii bukay (5:1-18)
 4. Quudintii dadkii badnaa (6:1-15)
 5. Ku dul socoshadii biyaha (6:16-21)
 6. Bogsiintii ninkii indho la'aanta ahaa (9:1-41)
 7. Sarakicintii Laasaros (11:1-57)

BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 2:1-11

¹Maalintii saddexaad waxaa Kaana tii Galili jiray aroos, Ciise hooyadiisna halkaasay joogtay. ²Waxaana arooska loogu yeedhay Ciise iyo xertiisii. ³Markii khamrigu dhammaaday Ciise hooyadiis waxay isaga ku tidhi, Khamri ma ay qabaan. ⁴Markaasaa Ciise wuxuu iyada ku yidhi, Islaan yahay. aniga iyo adiga maxaa inoo dhexeeya? Saacaddaydu weli ma iman. ⁵Kolkaasaa hooyadiis waxay midiidinyadii ku tidhi, Wax kastuu idinku yidhaahdo, yeela. ⁶Meeshaas waxaa yiil lix ashuun oo dhagax ah, oo loo dhigay caadada Yuhuudda oo daahirinta, mid kastaana wuxuu qaadi jiray qiyaas laba ama saddex metritis. ⁷Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Ashuummada biyo ka buuxiya, goortaasay buuxiyeen ilaa girgirka. ⁸Kolkaasuu wuxuu ku yidhi, Ka soo dhura oo u geeya ka miiska arooska madaxda u ah, wayna u geeyeen. ⁹Kii madaxda ahaa markuu dhadhamiyey biyihii khamriga noqday ma uu ogayn meel ay ka yimaadeen, laakiin midiidinyadii oo soo dhuray way ogaayeen; markaasaa kii madaxda ahaa u yeedhay ninkii arooska ahaa, ¹⁰oo ku yidhi, Nin kastaa marka hore wuxuu soo saaraa khamriga wanaagsan, oo markay u cabbaan siday doonayaan dabadeedna ayuu keenaa kan liita; adiguse khamriga wanaagsan ilaa haddeer ayaad dib u dhigtay. ¹¹Calaamooyinka Ciise tii ugu horraysay waxay ahayd tan uu ku sameeyey Kaana tii Galili. oo wuxuu ku muujiyey ammaantllsil, xertilsima way rumaysteen.

2:1 “jiray aroos” aroos xaafadeedyadu waxay ahaayeen dhacdooyin bulshadu iska lahayd, waxaana kasoo qayb qaadan jirtay bulshada oo xitaa maalmo badan joogi jirtay.

☐ “Kaana” eraygan waxa lagu dhex sheegay Injiilka Yooxanaa oo keliya (2:1, 11; 4:46; 21:2). Wax kusaabsanna waxaan ka ogsoonahay

1. Inay ahayd meeshii uu deganaa Nataana’el
2. Meeshii ay ka dhacday mucjisadii Ciise ee ugu horraysay

3. Inay u dhowdahay Kaferna'um

Meesha magaceedu wuxuu u muuqdaa inuu ku haboonyahay Kaana, oo ah erayga Cibraaniga ah ee “reed” (cane).

Waxa jira afar meelood oo la sheegay (AB, vol, p. 827)

1. Ain Qana, waxay hal mayl ka xigtaa woqooyiga Naasareet
2. Kafr Kanna, ku dhowaad saddex mayl woqooyiga Naasareet
3. Khirbet Qana, taag sideed iyo badh mayl xagga woqooyi kaga toosan Naasareet
4. Cana oo ku taalla Banaanka Asochis, sida uu sheegayo Josephus (*Life*, 86,206).

▣ **“Ciise hooyadiisna halkaasay joogtay”** Maryan waxay qayb ka ahayd oo caawinaysay kana shaqaynasay arooska. Waxa middan loo arki karaa (1) inay amarka siiynasay midiinaha (aayadda 5) iyo (2) inay qaabilsanayd xagga cabitaanka (aayadda 3). Waxay markaas ahaayeenbaa laga yaabaa qaraabo ama saaxiibbo.

2:3 “Khamri ma ay qabaan” Waxa waajib ahayd in Yuhuuddu ay martida siiyaan khamriga, waxaana khamrigan loo ansixiyay si cajiib leh, sida aan ka arki karno (1) faalladii uu bixiyay kii madaxda ka ahaa xafladda, aayadaha 9-10; (2) qirashadii Yuhuuddii joogtay maalmihii Ciise; ama (3) iyadoo ay tayadiisu fiicnayd oo isu dheelli tirnaa.

MAWDUUC GAAR AH: FIKIRKA KITAABKU KA QABO KHAMRIGA IYO KHAMRI CABNIMADA

I. Kitaabku waxa uu ka sheegayo

A. Axdiga Hore

1. *Yayin*- waa erayga guud ahaan loo adeegsado khamriga canabadka laga sameeyo (BDB 406), waxaana la adeegsaday 141 jeer. Asalkeeda lama hubo maxaa yeelay maaha asal ahaan Cibraani. Hadiyo jeerna waxa lagu magacaabi jiray khamiirka laga miiro khudaarka, badanaa canabka. Tusaale ahaan waxa ka mida aayadaha sheegaya Bilowgii 9:21; Baxniintii 29:40; Tirintii 15:5,10.
2. *Tirosh* – waa “khamri cusub” (BDB 440). Sababtuna waxay ahayd cimiladii Bariga Dhow saamaynteeda, oo marka khamriga la khamiiriyo lix saacadood kaddib ayuu ku samaysmi jiray. Eraygani haddba waxa uu sheegayaa khamri ku jira khamiirkii. Aayadaha wax ka sheegayana waxa ka mida Sharciga Kunoqoshadiisa 12:17; 18:4; Ishacyaah 62:8-9; Hoosheeca 4:11.
3. *Asis* – waa cabbitaan khamri ah leh alkohol (“khamriga macaan,” BDB 779, tusaale ahaan Yoo’eel 1:5; Ishacyaah 49:26).
4. *Sekar* – waa “khamri culus” (BDB 1016). Asal ahaan Cibraaniga waxa loogu adeegsaday “sarkhad.” Waxa aanu wataa waxyaalo lagu daray oo lagu sarkhaamayo. Waxa uu la mid yahay *yayin* (Maahmaahyadii 20:1; 31:6; Ishacyaah 28:7).

B. Axdiga Cusub

1. *Oinos* – Waxay u dhigantaa erayga Giriigga ah ee *yayin*
2. *Neos oinos* (khamri cusub) – waxay u dhigantaa erayga Giriigga ah ee *tirosh* (Markos 2:22).
3. *Gleuchos vomos* (khamri macaan, *asis*) – khamri ku jira cusboonaantiisii (Falimaha Rasuullada 2:13).

II. Adeegsiyiisa

A. Axdiga Hore

1. Khamrigu waa hadiyadda Ilaah (Bilowgii 27:28; Sabuurka 104:14-15; Wacdiyihii 9:7; Hoosheeca 2:8-9; Yoo’eel 2:19,24; Caamoos 9:13; Sekaryaah 10:7).
2. Khamrigu waa qayb ka mida qurbaan ahaanta waxyaalaha loo bixiyo (Baxniintii 29:40; Laawiyiintii 23:13; Tirintii 15:7,10; 28:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 14:26; Xaakinnadii 9:13).
3. Khamriga waxa loo adeegsaday dawo ahaan (2 Samuu’eel 16:2; Maahmaahyadii 31:6-7).
4. Khamrigu wuxuu noqon karaa dhibaato (Nuux – Bilowgii 9:21; Luut – Bilowgii 19:33,35;

- Samson – Xaakinnadii 16:19; Nabaal – 1 Samuu’eel 25:36; Yuriyaah – 2 Samuu’eel 11:13; Amnoon – 2 Samuu’eel 13:28; Eelaah – 1 Boqorradii 16:9; Benhadaad – 1 Boqorradii 20:12; xukumayaashii – Caamoos 6:6; iyo Haweenkii – Caamoos 4).
5. Khamriga waa la caayay (Maahmaahyadii 20:1; 23:29-35; 31:4-5; Ishacyaah 5:11,22; 19:14; 28:7-8; Hoosheeca 4:11).
 6. Khamriga waxa laga xarrimay kooxo khaas ah (wadaaddada xilka haya, Laawiyiintii 10:9; Yexesqeel 44:21; Nadiirka, Tirintii 6; iyo xaakinnada, Maahmaayadii 31:4-5; Ishacyaah 56:11-12; Hoosheeca 7:5).
 7. Khamriga waxa tusaale loogu adeegsaday wakhti iman doono (Caamoos 9:13; Yoo’eel 3:18; Sekaryaah 9:17).
- B. Amaanitaankiisa kitaabiga ah
1. Khamrigu waxbuu caawiyaa (Wacdiyihii 31:27-30).
 2. Rabbaaniyiintu waxay yidhaahaan “Khamrigu waa dawada ugu wayn, meesha aanu jirin khamrina waxa looga baahanaya dawooyin.” (BB 58b).
- C. Axdiga Cusub
1. Ciise biyo badan ayuu khamri u beddelay (Yooxanaa 2:1-11)
 2. Ciise wuxuu cabay khamri (Matayos 11:18-19; Luukos 7:33-34; 22:17ff).
 3. Butros waxa lagu eedeeyay inuu cabay khamri cusub maalintii Bentakostiga (Falimaha Rasuullada 2:13).
 4. Khamriga waxa loo isticmaali karaa daawo ahaan (Markos 15:23; Luukos 10:34; 1 Timoteyos 5:23).
 5. Hogaamiyayaashu maaha inay noqdaan kuwo la caayo. Tan macneheedu maaha inay gebi ahaanba iska daayaan (1 Timoteyos 3:3,8; Tiitos 1:7; 2:3; 1 Butros 4:3).
 6. Khamriga waxa loo adeegsaday tusaale ahaan (Matayos 22:1ff; Muujintii 19:9)
 7. Sarkhaanimada waa la dhaleeceeyay (Matayos 24:49; Luukos 12:45; 21:34; 1 Korintos 5:11-13; 6:10; Galatiya 5:21; 1 Butros 4:3; Rooma 13:13-14).
- III. Fahanka fiqi ahaaneed
- A. Xiisadda lahad ahaaneed
1. Khamrigu waa hadyad Ilaah
 2. Sarkhaanimadu waa dhibaato wayn
 3. Rumaystayaasha dhaqamada qaarkood joogaa waa inay Injiilka dartiis u xadidaan xorriyadooda (Matayos 15:1-20; Markos 7:1-23; 1 Korintos 8-10; Rooma 14).
- B. Dabciga waxyaalaha la inasiyay
1. Wax waloo wanaagsaniba Ilaabay ka yimaaddaan
 2. Aadanaha leexday hadiyadii Ilaah waxay ka dhigeen eedayn
- C. Caydu inaga ayay inagu jirtaa ee kuma jirto waxyaalaha. Waxyaalaha Ilaah abuuray shar maaha (Markos 7:18-23; Rooma 14:14,20; 1 Korintos 10:25-26; 1 Timoteyos 4:4; Tiitos 1:15).
- IV. Yuhuuddii Qarnigii hore dhaqankooda iyo khamiirinta khamriga
- A. Khamiirinta waxay u bilaabmi jirtay si dhakhso ah, ku dhowaad 6 saacadoo kaddib marka canabka lasoo gooyo.
 - B. Dhaqanka Yuhuuddu waxa uu sheegayaa in faxitaanku ahaa calaamadda marka khamriga cusub diyaarka yahay (*Ma aseroth*). Waxaana lagu magacaabi jiray “khamri cusub” ama “khamri macaan.”
 - C. Khamiirintu ugu horraysaa waxay dhammaan jirtay hal usbuuc kadib.
 - D. Khamiirinta labaad waxa loo diyaarin jiray ku dhowaad 40 casho. Xaaladdan marka uu gaadhana waxa lagu tilmaami jiray “khamri gaboobay” waxaana la bixin jiray isagoo is beddelay (*Edhuyyoth* 6:1).
 - E. Khamriga soo hadha waxa lagu tilmaami jiray mid wanaagsan, laakiinse waxay ahayd in la hubiyo inta aan la isticmaalin ka hor.
 - F. Khamriga caadi ahaan gabowgiisa waxa la sheegi jiray marka uu gaadho halsano khamiirintiisa kadib. Saddex sano ayaa ahayd muddada ugu dheer ee khamriga la kaydin karayay. Waxa lagu magacaabi jiray “khamri gaboobay” waxaana lagu qasi jiray biyo.

- G. Sanadihii u dambaysay ayaa dadku barteen in muddo dheer wax la kaydin karo, Laakiin dunidii hore awood umay lahayn, inay hor istaagaan dabiicadda.
- V. Odhaahda xidhitaanka ah
- A. Hubi khibraddaada, fiqigaaga, iyo fasiraadda kitaabka hana hoos isaga dhigin Ciise iyo Yuhuuddii/Masiixiyiintii qarnigii koobaad dhaqankooda! Waxa caddayd inay ahaayeen kuwo aan si buuxda uga joogsanin.
- B. Kuma baaqayo isticmaalka khamrada. Laakiinse dad badan ayaa siyaabo badan arrintan kitaabka ugu kala adeegsada kuna saleeya madaahib amaba dhaqamo.
- C. Aniga Rooma 14 iyo 1 Korintos 8-10 ayaa isiiyay fahan ku salaysan jacaylka iyo tix gelinta rumaystayaasha, iyo sidii dhaqamadeena injiiku ugu faahi lahaa, taasi oon ahayn xorriyaddeena amaba dhaleecanteenna shakhsi ahaaneed. Haddii haddaba, kitaabku yahay meesha rumaysadkeennu ku tiirsan yahay, waxaan u baahanahay in mawduucan aan dib uga fikirno.
- D. Haddii dhammaanba dadka aan xakamayno inaga oo ka dhigayna doonista Ilaah, side ayaan Ciise u meteli karnaa, sidoo kalena maxaa laga yeelaya dadka dhaqan ahaanta u isticmaala khamrada (Europe, Israa'iil, Argentina)?

2:4 “Islaanyahay” waxay ahayd eray cibraani ah oo tix gelin ahaan loo adeegsan jiray (4:21; 8:10; 19:26; 20:15).



NASB “aniga iyo adiga maxaa inoo dhexeeya?”
NKJV “waxaad danaynaso maxaan anigu ka sameeyaa?”
NRSV “muxuu yahay waxa adiga iyo aniga inoo dhexeeya?”
TEV “ha iisheegin wax aan sameeyo”
NJB “maxaad aniga iga rabtaa?”

Erayada Cibraaniga ah ee “aniga iyo adiga” (Xaakinnadii 11:12; 2 Samuu’eel 16:10; 19:22; 1 Boqorradii 17:18; 2 Boqorradii 3:13; 2 Korintos 35:21; Matayos 8:29; Markos 1:24; 5:7; Luukos 4:34; 8:28; Yooxanaa 2:4). Middani waxay ahayd Ciise xidhiidhkiisa cusub ee uu la yeelanayo qoyskiisa (Matayos 12:46; Luukos 11:27-28).

▣ **“Saacaddaydu weli ma iman”** Middani waxa ay tusinaysaa Ciise shakhsi ahaan siduu u fahansanaa ujeedadiisa loo magacaabay (Markos 10:45). Yooxanaa eraygan ah “saacad” wuxuu u adeegsanayaa dhawr siyaabood.

1. Wakhti ahaan (1:39; 4:6, 52, 53; 11:9; 16:21; 19:14; 19:27)
2. Dhamaadka wakhtiga (4:21, 23; 5:25, 28)
3. Maalmihiisa u danbeeya (xidhitaankii, maxkamadayntii, dhimashadii, 2:4; 7:30; 8:20; 12:23, 27; 13:1; 16:32; 17:1)

2:5 “Wax kastuu idinku yidhaahdo, yeela” Maryan may fahamsanayn gebi ahaanba Ciise sida uu u rabay inuu isaga ilaaliyo inuu xaaladdan iyada ah waxan sameeyo.

2:6

NASB “oo loo dhigay caadada Yuhuudda oo daahirinta”
NKJV “sidii caadada daahirinta ee Yuhuuddu ahayd”
NRSV “oo loo dhigay caadada Yuhuudda ee daahirinta”
TEV “Yuhuudda oo lahaa caado xagga daahirinta ah”
NJB “ashuuno loogu talo galay caadada Yuhuudda ee daahirinta”

Jalxadahan biyuhu ku jiraan waxa loo adeegsan jiray daahirinta lugaha, gacmaha, maacuunka, iwm. Yooxahaa haddaba faalladan wuxuu u samaynayaa, si uu kuwa aan Yuhuudda ahayn u fahansiiyo.

2:6-7 “Iix ashuun oo dhagax ah,” Sida hadiyo goorba Yooxanaa tilmaamayo, middani waxay calaamad u noqon kartaa labo ujeeddo.

1. Caawimaadda labada qofee is guursanaya
2. Waxay ahayd calaamad tusinaysa Ciise oo ah dhammaystirka wixii Yuhuuddu sugayeen. Haddaba, ujeedada odhaahdan ka danbaysaa waxay noqon kartaa

- a. Tirada “6” wuxuu calaamad u yahay kartida aadanaha
- b. Ciise markuu ka dalbaday inay ashuunnada ilaa girgirka buuxiyaan, waxa laga yaabaa inuu ugala jeeday calaamad oonay ahayn oo keliya in khamri badan la helo.
- c. Khamri badan oo ahaa mid aad ugu badan aroos dhaqameed.
- d. Khamrigu wuxuu calaamad u ahaa casriga cusub (Yeremyaah 31:12; Hoosheeca 2:22; 14:7; Yoo’eel 3:18; Caamoos 9:12-14).

▣ **“mid kastaana wuxuu qaadi jiray qiyaas laba ama saddex metritas”** qiyaasta waxa loo adeegsaday erayga Cibraaniga ah ee *bath*. Waxaana jiray saddex halbeeg oo *bath* ah isla markaasna jiray wakhtigii Ciise markaas lama hubo ka uu ahaa, laakiinse mucjisedan waxa ku samaysmay khamri aad u badan!

MAWDUUC GAAR AH: HALBEEGYADII CUFKA IYO CULAYSKA EE DADKII HORE EE BARIGA DHEXE (METROLOGY)

Halbeegyada miisaanka loo adeegsan jiray wuxuu ahaa mid aad muhiim ugu ah, ganacsatadii iyo dadkii hore ee beeralayda ahaa dhaqaalohooda. Kitaabku waxa uu sheegayaa in Yuhuuddu ay si cadaalada midkoodba kan kale uula dhaqmo (Laawiyiintii 19:35-36; Sharciga Kunoqoshadiisa 25:13-16; Maahmaayadii 11:1; 16:11; 20:10). Dhibaataada may ahayn daacadnimada oo keliya, laakiinse nidaamyo aan kale oon xadaysnayn ayaa lagu adeegsan jiray Falastiin. Waxay u muuqataa markaa inay jireen labo nooc oo miisaanka ahaa; “fudayd” iyo “culays” waxkastaana koobsanayo (eeg The Interpreter’s Dictionary of the Bible, vol. 4, p. 831). Sidoo kale qaabka (asalkiisu yahay 10) ee Masar wuxuu u dhigmayay qaabka (asalkiisu yahay 6) ee Masopotamia.

Badanaa “mugagga” iyo “qiimaynta” ee la adeegsaday waxay ahaayeen kuwo lagu saleeyay xubnaha aadanaha, tanka xooluhu qaadi karaan, iyo beeralaydu waxyaalaha ay wax ku shuban jireen, kuwaasina may ahayn kuwo heer lahaa. Haddaba, qiyaastu wuxuun bay ahayd midaan badanaa sugnayn, sidaas darteedna sida ugu fudud ee halbeegyada qiyaasta lagu muujin karaa waxay tahay iyadoo la eego xidhiidhka ka dhexeeya.

I. Erayada badanaa Mugga loo adeegsaday

A. Qiyaasta waxa engegan

1. Homer (BDB 330, waxa suurto gala inuu yahay “qaadka dameerka,” BDB331), Laawiyiintii 27:16; Hoosheeca 3:2
2. Letekh (ama lethech, BDB 547, waxa suurto gala in lagu sheegay Hoosheeca 3:2)
3. Ephah (BDB 35), Baxniintii 16:36; Laawiyiintii 19:36; Yexesqeel 45:10-11,13,24
4. Se’ah (BDB 684), Bilowgii 18:6; I Samuu’eel 25:18; 1 Boqorradii 7:1,16,18
5. Omer (BDB 771 II, waxa kaloo suurto gala “a sheaf” [badar qaydhin], BDB 771 I), Baxniintii 16:16,22,36; Laawiyiintii 23:10-15
6. ‘Issaron (BDB 798, “toban meeloodow meel” ka mida ephah), Baxniintii 29:40; Laawiyiintii 14:21; Tirintii 15:4; 28:5,13
7. Qav (ama Kab, BDB 866), 2 Boqorradii 6:25

B. Qiyaasta dareerayaasha

1. Kor (BDB 499), Yexesqeel 45:14 (wuxuu noqon karaa qiyaasta adkaha, 2 Korintos 2:10; 27:5)
2. Bath (BDB 144 II), 1 Boqorradii 7:26,38; 2 Korintos 2:10; 4:5; Ishacyaah 5:10; Yexesqeel 45:10-11,14
3. Hin (BDB 228), Baxniintii 29:40; Laawiyiintii 19:36; Yexesqeel 45:24
4. Log (BDB 528), Laawiyiintii 14:10,12,15,21,24

C. Jadwal (lagasoo qaatay Roland deVaux, kitaabkiisa *Ancient Israel*, vol. 1, p. 201 iyo *Encyclopedia Judaica*, vol. 16, p. 379)

Homer (dry) = 1
 kor(dareere ama adke)
 Ephah (adke) = bath 10 1
 (dareere)

Se'ah (adke)	30	3	1				
Hin (dareere)	60	6	2	1			
Omer/issaron (adke)	100	10	-	-	1		
Qav/kab (adke)	180	18	6	3	-	1	
Log (dareere)	720	72	24	12	-	4	1

II. Erayada culayska ee hadiyo goor la adeegsaday

A. Miisaanada ugu caansani waa talent, shekel, iyo gerah.

1. Miisaanka ugu wayn Axdiga Hore dhexdiisu waa talent. Baxniintii 38:25-26 waxa aan ka baran karnaa in 300 shekels (“miisaan goobo ah” BDB 503).
2. Erayga shekel (BDB 1053, “miisaan”) in badan baa la adeegsaday, Laakiinse qoraalka laguma dhex sheegin. Waxa jira haddaba qiimayno kala duwan oo shekel ku leeyahay laguna sheegay Axdiga Hore dhexdiisa.
 - a. “Heer ganacsi” (NASB ga Bilowgii 23:16)
 - b. “shekel ka magan geliyada” (NASB ga Baxniintii 30:13)
 - c. “miisaanka boqorrada” (NASB ga 2 Samuu’eel 14:26), sidoo kale waxa lagu magacaabay “miisaanka boqortooyada” sida ku sugan Elephantine ka.
3. Gerah (BDB 176 II) waxa lagu qiimeeyay halkii shekel ba labaatan (Baxniintii 30:13; Laawiyiintii 27:25; Tirintii 3:47; 18:16; Yexesqeel 45:12). Waxay kuwani ku kala duwanaayeen Mesopatamiya iyo Masar. Israa’iil iyagu waxay raaceen qiimayntii guud ahaan laga adeegsan jiray Kancaan.
4. Mina (BDB 584) waxa lagu qiimeeyay 50 ama 60 shekel. Ereyganna badanaa waxa laga helaa kitaabyada danbe ee Axdiga Hore (Yexesqeel 45:12; Cesraa 2:69; Nexemyaah 7:70-71). Yexesqeel wuxuu adeegsaday 60 kii meeloodba hal, halka Kancaan ay ka isticmaaleen 50 kii meeloodba meel.
5. Beka (BDB 132, “shekel badhkii,” Bilowgii 24:22) labo jeer oo keliya ayaa lagu dhex isticmaalay Axdiga Hore (Bilowgii 24:22; Baxniintii 38:26) iyadoo lagu qiimeeyay shekel kala badhkii. Magacana waxa loogala jeedaa “qaybin.”

B. Jadwal

1. Marka loo eego Pentateuch

talent	1					
mina	60	1				
shekel	3000	50	1			
beka	6000	100	2		1	
gerah	60,000	1,000	20		10	

2. Marka loo eego Yexesqeel

talent	1					
mina	60	1				
shekel	3,600	60	1			
beka	7,200	120	2	1		
gerah	72,000	1,200	20	10	1	

2:8

NASB	“ka miiska madaxda u ah”
NKJV	“ka miiska arooska madaxda u ah”
NRSV	“abaabulaha xafladda”
TEV	“ninka xafladda madaxa ka ah”
NJB	“madaxwaynaha xafladda”

Qofkani waxa uu noqon karaa midkood (1) qof lagusoo marti qaaday inuu xafladda ka shaqeeyo (2) addoon lasoo kiraystay oo martida u adeegaysay.

2:10 ujeedudu waxay tahay iyada oo marka hore la keeni jiray khamriga wanaagsan, kaddibna waxa marka danbe la keeni jiray ka aan wanaagsanayn. Laakiin halkan sida aan ka arki karno, kii ugu wanaagsanaa ayaa ilaa hadda ugu danbeeya! Waxay middani u muuqataa farqiga u dhexeeya axdigii hore (khamriga gaboobay) ee Yuhuudda iyo axdiga cusub (khamriga cusub) ee lagu helayo Masiixa (kitaabka Cibraaniyada). Daahirintii Ciise ee Macbadka (2:13-25, waxay qayb ka tahay qaabka taariikh ahaaneed ee Yooxanaa raacayo isagoo uga socda ujeedadiisa fiqi ahaaneed) waxa laga yaabaa inay calaamad u ahayd xaqiiqadan.

2:11 “Calaamooyinka Ciise tii ugu horraysay” Injiilka Yooxanaa waxa uu koobsnayaa todobo calaamo iyo fasaaraddooda, middanina waa tii ugu horraysay. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 1:1.

▣ **“oo wuxuu ku muujiyey ammaantsii, xertilsima way rumaysteen.”** Muujinta (eeg fiirada gaarka ah ee falka 1:31) ammaanta Ciise (fiiro u yeelo 1:14) waxay ahayd ujeedada mucjisada. Mucjisadani iyadoo la mida kuwo kale oo badan, waxay u muuqataa si toosa inay ugu muuqatay xertiisa! Tan macneheedu haddaba maaha in rumaysadkoodu ugu horraynba halkan uu bilow ku yahay, Laakiin waxay ahaayeen kuwo ku socda sidii ay ku baran lahaayeen shakhsiyaddiisa iyo shaqadiisa. Mucjisooyinku waxay muujinayaan shakhsiyadda iyo shuqullada dhabta ah ee Masiixa. Haddaba, lama hubo in dadkii martida ahaa inay ogaadeen waxa dhacay iyo inkale.

NASB (UPDATED) TEXT: 2:12

¹²Waxaas dabadeed wuxuu tegey Kafarna um. waxaana la socday hooyadiis iyo walaalihiis iyo xertiisii, oo maalmo aan badnayn ayay meeshaas joogeen.

2:12 “Kafarna’um”kaddib markii reer Naaseret rumaysan waayeen (Luukos 4:16-30) tani waxay noqotay xarunta ugu muhiimsan ee Ciise ku lahaa Galiili (Matayos 4:13; Markos 1:21; 2:1; Luukos 4:23, 31; Yooxanaa 2:12; 4:46-47).

▣ Tani waxay ahayd aragtii degdegga ahayd ee shaqada Ciise ku arkeen qoyskiisu, waana midda ay iftiiminayso mucjisadan uu ku sameeyay Kaana.

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 2:13-25

A. Waxa jirta dood culimmada dhex taalla oo ku saabsan inta jeer ee Ciise uu nadiifiyay Macbadka. Yooxanaa waxa uu sheegayaa in Ciise uu Macbadka nadiifiyay bilowgii shaqadiisa, halka injiillada kale (Matayos 21:12; Markos 11:15 iyo Luukos 19:45) ay ka sheegayaan inuu nadiifiyay usbuucii ugu dambeeyay noloshiisa. Haddaba, marka loo fiirsado labada arrimoodba waxa laga yaabaa inay jirtay laba jeer oo Ciise uu Macbadka nadiifiyay.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa hubaal oo dhici karta in Yooxanaa shuqulladii Ciise u raacayo sababo fiqi ahaaneed aawadood (Yooxanaa wuxuu ka hadlayaa Ilaahnimada Ciise ee buuxda laga bilaabo cutubka 1). Mid kasta oo ka mida qorayaasha Injiilku wuxuu haystay xorriyadda waxyiga ah oo uu kaga hadlayaayay isaga oo soo koobaya, shaqadii, waxbaristii iyo noloshii Ciise. Mana aaminsani inay haysteen xorriyadda ay ereyadooda ku dhigayeen afka Ciise si ay u sameeyaan dhacdooyin. Waa inaan xasuusnaado inaanu Injiilku ahayn xusuus qorrada casriga ah, laakiinse uu yahay wacdin ku jihaysan akhristayaal gaar ah oo loo doortay. Injiilladu maaha taariikh, laakiinse waxa ay diiwaan gelinayaan ama soo koobayaan eraydii Ciise. Middan haddaba loogama qaadan karo inay ahaayeen kuwo khaldan. Suugaanta reer Barigu waxay ahayd mid ku salaysan dhaqamo kala duwan, waxaanay ka gedisnayd tan reer galbeedka. Eeg kitaabka ay leeyihiin Gordon Fee iyo Douglas Stuart, *How To Read the Bible For All Its Worth*, pp. 127-148.

B. Nadiifinta amaba daahirinta Macbadka ee Yooxanaa qorayo, wuxuu guud ahaanba ku salaysan yahay ujeedo fiqi ahaaneed, taasi oo ahayd Ciise sidii uu ula tacaalayay ugu horraynba ummaddii Yuhuudda. Middana waxa laga arki karaa sida ku sugan cutubka 3 markii uu la sheekaysanayay Nikodemos. Si kastaba ha ahaatee, cutubka 4 Ciise waxa uu ku bilaabayaa inuu kula hadlo bulsho ballaadhan, waanu marka uu ku bilaabayaa naagtii reer Samaariya.

NASB (UPDATED) TEXT: 2:13-22

¹³iddii Kormaridda oo Yuhuudda waa dhowayd, oo Ciisena wuxuu u kacay Yerusaaalem. ¹⁴Wuxuu macbudka ku arkay kuwa ku iibinaya dibiyoy iyo ido iyo qoolleyo, iyo kuwa fadhiya oo lacagta bedbeddelaya. ¹⁵Markaasuu xadhko karbaash ka sameeyey, kulligoodna ayuu macbudka ka eryay, dibiyada iyo idaha labadaba, lacagtiina wuu ka daadiyey kuwii bedbeddelayay, miisaskoodiina wuu rogay. ¹⁶Kuwii qoolleyaha iibinayayna wuxuu ku yidhi, Waxyaalahan halkan ka qaada. Guriga Aabbahay ha ka dhigina guri baayacmushtari. ¹⁷Xertiisii waxay xusuusteen in la qoray. Qiiradaan gurigaaga u qabo ayaa i gubaysa. ¹⁸Sidaa aawadeed Yuhuuddu waa u jawaabtay oo ku tidhi isaga, Calaamadee baad na tusaysaa waxaad waxyaalahaas u samaynayso? ¹⁹Ciisena waa u jawaabay oo ku yidhi, Macbudkan dumiya oo saddex maalmood dabadeed ayaan kicin doonaa. ²⁰Yuhuuddu haddaba waxay yidhaahdeen, Lix iyo afartan samladood ayaa macbudkan la dhisayay, adiguna ma waxaad ku kicinaysaa saddex maalmood? ²¹Isaguse wuxuu ka hadlayay macbudka jidhkiisa ah. ²²Sidaa aawadeed markuu ka soo sara kacay kuwii dhintay, xertiisii way soo xusuusteen inuu taas ka hadlay, wayna rumaysteen Qorniinka iyo hadalkii Ciise yidhi.

2:13 “Kormaridda” Ciidda sanadkiiba halka mar ahayd waxa lagu sheegay Baxniintii 12 iyo Sharciga Kunoqoshadiisa 16:1-6. Ciiddani waxa weeyi midda keliya ee aan ku taariikhayno shaqadii Ciise. Injiillada kale waxa ay shaqadii Ciise ka sheegayaan hal sano (hal ciida oo keliya ayaa lagu sheegay). Laakiin Yooxanaa waxa uu sheegayaa saddex Kormarisood: (1) 2:13, 23; (2)6:4 iyo (3)11:55; 12:1; 13:1; 18:28, 39; 19:14. Waxa kaloo macquula in mid afraad laga heli karo 5:1. Garan mayno muddadii Ciise shaqadiisa uu waday, laakiinse Yooxanaa ayaa waxa uu sheegayaa, inay ugu yaraan ahayd saddex sano iyo afar ama shan bilood.

Yooxanaa Injiilkiisu waxa uu ku qaabaysan yahay waxna ka sheegayaa ciidihii Yuhuudda (Kormaridda, Waababka, iyo Hanukkah. Eeg Richard N. Longenecker kitaabkiisa *Biblical Exegesis in the Apostolic Period*, 2nd ed., pp. 135-139).

MAWDUUC GAAR AH: KORMARIDDA

- I. Odhaahda furitaanka ah
 - A. A.Middani waxa ay ka timid falkii xukunka ahaa ee Ilaah ku filiyay Masaarida isaga oo YHWH jacaylkiisa kusoo badbaadiyay ummadda Israa’iil ee uu doortay (gaar ahaan nebiyada).
 - B. Baxniintu waxay ahayd oofinta gaarka ah ee YHWH ku fuliyay wixii uu Ibraahim ugu ballan qaaday Bilowgii 15:12-21. Haddaba, Kormariddu waa xasuusta Baxniintii.
 - C. Tani waa xukunkii (juquraafi ahaan, Masar iyo Goosheen) iyo baabiinta calaamaddii YHWH uu Masar ugu soo dhiibay Muuse.
- II. Erayga lafaahantiisa (BDB 820, KB 947)
 - A. Macnaha MAGACA lama hubo
 1. Wuxuu la xidhiidhaa “belaayooyinkii” (Baxniintii 11:1); YHWH malagiisu wuxuu baabiinayaa ilmaha ugu horreeya ee dadka iyo lo’du waxa ay dhalaan.
 - B. Macnaha FALKA
 1. “dhutin” (2 Samuu’eel 4:4), waxaana loo adeegsaday iyadoo loogala jeedo “ka boodista guryaha calaamadsan” (Baxniintii 12:13,23,27, BDB 619)
 2. “ciyaarid” (1 Boqorradii 18:21)
 3. Akkadian – “aamusiin”
 4. Masaarida – “baabiin” (eeg A. 1.)
 5. Falalka isku midka ah ee Ishacyaah 31:4, “ilaalin” (REB ka Baxniintii 12:13)
 6. Dhawaaq Masiixiyiintii hore caan ku ahaayeen una dhexeeyay erayga Cibraaniga ah ee *pasha* ilaa ka Giriigga ah ee *pascho*, macnihiisuna ahaa “silic”
 - C. Tusaalayaal taariikhi ah oo suurto gala
 1. Neefka loo sadqayn jiray sanadka cusub
 2. Sadqaynta iyo cuntada lasoo bandhigi jiray marka loo baxayo dhulka xoolu daaqayaan ee daaqsinka ah
 3. Sadqaynta la iskaga jeedinayo sharka ee reer baadiyuhu samayn jireen
 - D. Sababtu maaha adkaanshaha eraygan macnihiisa oo keliya, laakiinse sidoo kale ma jiro meel

asalkeeda loo raaca, maxaa yeelay Kormarista wax la mida waxa samayn jiray dhaqamo kale.

1. Wakhtiga guga
2. Isagoo la mida magic aan lagaranayn
3. Wax la xidhiidha cawayska habeenkii
4. Isticmaalka dhiigga
5. Sawirrada malaa'igo/ rooxaan
6. Cunto gaar ah
7. Waxyaalo la xidhiidha beeraha
8. Wadaad la'aan, haggis la'aan, muhiimadda oo gudaha uun lasiiyo

III. Dhacdada

- A. Dhacdada lafteeda waxa lagu diiwaan geliyay Baxniintii 11-12.
- B. Ciidda sanadlaha ahayd waxa lagu sheegay Baxniintii 12 iyadoo ay la socotay sided cisho oo aan kimista la khamiirinayn.
 1. Asal ahaan waxay ahayd dhacdo gudaha ah, Baxniintii 12:21-23; Sharciga Kunoqoshadiisa 16:5 (Tirintii 9)
 - a. Ma jiro wadaad
 - b. Ma jiro waxkaloo gaar ah
 - c. Waxa loogu talo galay isticmaalidda dhiigga oo keliya
 2. Waxay noqotay dhacdo muqadas ah
 3. Isku darista qalitaanka xoolaha iyo kimista aan khamiirka lahayni waxa ahayd mid la dhammays tiro maalama *Abib* ama *Nisan* 14 iyo 15-21.
- C. Calaamadda lahaanshaha ilmaha u horreeya ee dadka iyo lo'da iyo badbaadadooda waxa lagu sheegay Baxniintii 13

IV. Diiwaan gelinta taariikh ahaaneed ee dadka u dabaal dega

- A. Kormaristii ugu horraysay waxa lagu dhex dabaal degay Masar, Baxniintii 12
- B. Buur Siinay, Tirintii 9
- C. Kormaristii ugu horraysay ee Kancaan loogu dabaal dego Yashuuca 5:10-12
- D. Wakhtigii Sulaymaan u adeegaysay macbadka, 1 Boqorradii 9:25 iyo 1 Korintos 8:12 (sigaara looma sheegin)

▣ **“oo Ciisena wuxuu u kacay Yeruusaalem”** Yuhuudda hadiyo goor ka hadalkooda ku saabsan Yeruusaalem macnihiisa fiqi ahaaneed ayaa wuxuu ka badnaa macnihiisa juquraafi ahaaneed.

2:14 “Wuxuu macbudka ku arkay” macbadkii Herodos kii Waynaa (oo xukumay Falastiin 37-4 C.H.) wuxuu u qaybsanaa todoba qaybood. Qaybta debadda waxa iska lahaa kuwa aan Yuhuudda ahayn, waxaanay ahayd meel ay ka samaysteen goobo ganacsi halkii ay uga hoyan lahaayeen kuwa keenayay sadaqadda iyo xoolaha sidqaynta.

▣ **“kuwa ku iibinaya dibiyo iyo ido iyo qoolleyo,”** Dadka kasoo socdaalayay masaafooyinka aadka ufogi, waxa ay u baahnaayeen inay iibsadaan xayawaano gali karo sadqaynta. Si kastaba ha ahaatee, qoyska wadaadka ugu sarreeya ayaa goobahan ganacsi maamuli jiray iyaga oo xitaa goyn jiray qiimaha xayawaanka la iibinayo. Sidoo kale waxa aan ogsoonahay in dadka qaarkood marka ay keenaan xoolohooda ay u sheegi jireen inaan la aqbalayn, sidaasi darteedna dadkaasi waxa ku qasbanaayeen inay xoolaha halkan ka iibsadaan.

▣ **“lacagta bedbeddelaya.”** Baahida dadkan looqabay waxa jirta labo siyaabood oo loo sharixi karo: (1) lacagta keliya ee macbadku aqbalayay waxay ahayd shekel. Maadaama oo shekelka Yuhuuddu ahaa mid la joojiyay, ayaa macbadku waxa uu aqbali jiray shekelka ka imanayay Tyre ka ee la adeegsan jiray wakhtigii Ciise, ama (2) lama ogolayn lacag aanu Boqorka Roomaanku ku sawirnayn oo la aqbali jiray, waxaana dabcan jirtay cashuur!

2:15 “Markaasuu xadhko karbaash ka sameeyey, kulligoodna ayuu macbudka ka eryay” cadhadii Ciise ee Muuqatay si cad ayaa halkan looga arkayaa, waana meeshii YHWH lagu yaqaanay oo hadda noqotay meel aan waxba lagu caabudin. Haddaba, cadhada lafteedu maaha denbi! Waxa suurta gala Bawlos hadalkiisa uu ku sheegayo Efesos 4:26, inay tahay mid la xidhiidhay falkan. Waxaana jira waxyaabo inaga cadhaysiin kara.

2:16 “Waxyaalahan halkan ka qaada.” Waa fal amar ah oo loogala jeedo “waxyaalahan halkan ka fogeeya!”

▣ **“Guriga Aabbahay ha ka dhigina guri baayacmushtari.”** Waa amar ay ku jirto diidmo taasi oo macneheedu yahay in la joojiyo fal amaba waxyaalo hore loogu dhaqmayay. Injiillada kale (Matayos 21:13; Markos 11:17; Luukos 19:46) waxa ay soo xiganayaan Ishacyaah 56:7 iyo Yeremyaah 7:11 marka ay arrintan tilmaamayaan. Si kastaba ha ahaatee, waxsii sheegyadan Axdiga Hore laguma dhex sheegin Yooxanaa. Waxa haddaba suurto gala, in middani tahay hadal maldahan oo ku saabsan waxsii sheegyadii ku saabsanaa Masiixa ee Sekeryaah 14:21ff.

2:17 “Xertiisii waxay xusuusteen” Odhaahdani waxa ay ka tarjumaysaa, in iftiiminta Ciise iyo gacan siinta Ruuxu, ay nimankani goor danbe garadsiiyeen xaqiiqada Ciise iyo shaqadiisa (aayadda 22; 12:16; 14:26).

▣ **“in la qoray”** waxa uu hadalkan macnihiisu yahay “wuxuu joogaa isagoo qoran.” Waxaanay ahayd qaab lagu tilmaamayay Axdiga Hore (6:31, 45; 10:34; 12:14; 20:30). Waxaana lagasoo xigtay Sabuurka 69:9 ee ku sugan LXX ka. Sabuurkani wuxuu la mid yahay Sabuurka 22, oo tilmaamaya qodbitaanka Ciise. Addeecitaanka Ciise iyo caabudaaddiisa runta ahi waxay ahaayeen kuwo u hoggaamin doonay dhimashada, taasina waxa ay ahayd doonista Ilaah (Ishacyaah 53:4, 10; Luukos 22:22; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28).

2:18

NASB “Calaamadee baad na tusaysaa waxaad waxyaalahaas u samaynayso?”
NKJV “Calaamadee baad natusaysaa, inta aad waxyaalahan samaynaso”
NRSV “Calaamadee ayaad nagu tusin kartaa waxan aad samaynaso”
TEV “Mucjisadee ayaad samayn kartaa adigoo natusinaya inaad u qalanto”
NJB “Calaamadee ayaad na tusinaysaa marka aad sidan u dhaqmayso”

Waxay ahayd su’aal ay Yuhuuddu aad u danaynayeen oo la xidhiidhay Ciise. Farriisiintuna waxay sheegteen in awooddiisa uu kala yimid shaydaanka (8:48-49, 52; 10:20). Waxay rajaynayeen in Masiixu uu waxyaalo gaara u qaban doono siyaabo gaar ah. Kaddibna muu samaynin waxyaalahaas gaarka ah, waxaanay bilaabeen inay ka yaabaan Isaga (Markos 11:28; Luukos 20:2), sidii xitaa Yooxanaa Baabtiisuhuba sameeyay.

2:19 “Macbudkan dumiya oo saddex maalmood dabadeed ayaan kicin doonaa” erayga Giriigga ah ee macbad (*hieron*) ee ku sugan aayadaha 14 iyo 15, wuxuu tilmaamayaa agagaarka masaaxada Macbadka, halka erayga (*naos*) ee aayadaha 19, 20, iyo 21 uu ka sheegayaan gudihiiisa. Waxa jiray haddaba hadallo badan oo laga sheegay odhaahdan. Waxa cad in Matayos 26:60ff; Markos 14:57-59; Falimaha Rasuullada 6:14 ay sheegayaan inay middani tahay qodbitaanka iyo sarakicidda Ciise. Si kastaba ha ahaatee, macnaha halkan marka loo fiirsado, waxa sidoo kale laga yaabaa inay sheegayso macbadka laftiisa uu burburiyey Tiitos 70 C.D. (Matayos 24:1-2). Odhaahdayadni markaas waxa ay la xidhiidhaan xaqiiqada Ciise iyo caabudaadda cusub ee diiradda saaraysa isaga balse aan ahayn diintii Yuhuudda (4:21-24). Markalena Yooxanaa eraygan wuxuu u isticmaalayaa labo macne!

2:20 “Lix iyo afartan sanadood ayaa macbudkan la dhisayay” Herodos kii Waynaa ayaa dib u dhis iyo qaabayn ugu sameeyay macbadka labaad (wakhtigii Zerubbabal, cf. Haggai) si uu u dejiyo dadka Yuhuudda ah. Yosebas ayaa wuxuu inoo sheegayaa, inuu bilaabmay 20 ama 19 C.H. haddii markaas middani sax tahay, waxa taas macneheedu yahay in dhacdadan khaaska ahi dhacday sanadkii 27-28 C.D. Sidoo kale waxa aan ogsoonahay in ka shaqaynta macbadku socotay ilaa 64 C.D. Macbadkani wuxuu markaas noqday rajadii waynayd ee Yuhuudda (Yeremyaah 7). Waxaana macbadka cusub ku bedeli doonay Ciise laftiisa. Sida ka muuqata 1:14, wuxuu metalayay waababka, hadana wuxuu metalayaa macbadka! Waa tusaalayaal cajiib leh oo ku saabsan nijaarkii reer Naasereet! Ilaah iyo aadanahu haddan waxa ay ku kulmeen oo isku weheshadeen Ciise Masiix dhexdiisa!

2:21 “saguse wuxuu ka hadlayay macbudka jidhkiisa ah.” Markii Ciise ereyadan ku hadlay xertu waxay ahaayeen kuwo aan ogsoonayn xaqiiqada arrintan (aayadda 17). Xasuusnow in qoraalkan Yooxanaa ahaa tobanaan sano kadib. Ciise wuxuu ogsoonaa ujeedada uu u yimid, waxaanay u muuqataa saddex ujeedooyin

1. Inuu Ilaah muujiyo
 2. Inuu tusaale u noqdo aadananimada runta ah
 3. In naftiisa uu rahan ahaan ugu bixiyo kuwo badan dartdood
- Ujeedadan danbe ayaa ah mudda aayaddu sheegayso (Markos 10:45; Yooxanaa 12:23, 27; 13:1-3; 17:1).

2:22 “xertiisii way soo xusuusteen inuu taas ka hadlay” Hadiyo goor erayada Ciise waxay ahaayeen kuwo xertiisu ay uga faa’iidaysan jireen si ka badan dadka uu la hadlayay. Haddaba hadiyo jeer waxay ahaayeen kuwo aan wakhtigaas badanaa fahmi jirin.

▣ **“ayna rumaysteen Qorniinka”** inkasta oo qoraalka aayaddu aanu sheegaynin Qorniinka uu yahay, waxa suurto gala inuu qoraalka Sabuurka 16:10 ahaa ka sarakicista ee Ciise maldahay (Falimaha Rasuullada 2:25-32; 13:33-35). Qoraalkan mid lamidana waxa lagu sheegay Yooxanaa 20:9.

NASB (UPDATED) TEXT: 2:23-25

²³Markuu Yerusaaalem joogay wakhtigii liddii Kormaridda dad badan ayaa magiciisa rumaystay markay arkeen calaamooyinkuu sameeyey. ²⁴Laakiin Ciise qudhiisu iskuma hallayn iyaga, waayo dadka oo dhan ayuu yiqiin, ²⁵oo uma baahnayn in laga marag furo dadka, waayo, isaga qudhiisu waa yiqiin waxa dadka ku jira.

2:23 “dad badan ayaa magiciisa rumaystay” erayga “rumaystay” waxa uu Giriigga ku yahay (*pisteo*) waxaana sidoo kale uu noqon karaa “iimaan” ama “isku hallayn.” Magacu haddaba kuma soo aroorayo injiilka Yooxanaa, Laakiin falka ayaa badanaa lagu adeegsaday. Macnaha halkan laga fahmi karana, lama garanayo dadka Ciisaha reer Naasereet rumaystay cidda ay ahaayeen. Tusaalayaasha kale ee sida gaarka ah loogu adeegsaday eraygan “rumays” waxa laga heli karaa Yooxanaa 8:31-59 iyo Falimaha Rasuullada 8:13, 18-24. Rumaysadka kitaabiga ah ee runta ahina maaha ka jawaab celinta ugu horraysa oo keliya. Waxa loo baahan yahay inuu ahaado mid sii socda oo xernimo ku dhisan (Matayos 13:20-22, 31-32).

Dhinaca kale rumaystayaashani waxay arkeen mucjisooyinkii Ciise (2:11; 7:31). Ujeedadooduna waxay ahayd inay ansixiyaan shaqsiyadda iyo shaqada Ciise. Si kastaba ha ahaatee, waa in la ogaado in rumaysadka noocaas ah ee ku dhisan shaqadu, inaanu muhiim ahayn (4:38; 20:29). Rumaysadka meesha lagu samaynayaa waa inuu ahaado Ciise (20:, 30-31). Mucjisooyinkuna maaha kuwo iskood u ah calaamooyinka Ilaah (Matayos 24:24; Muujintii 13:13; 16:14; 19:20). Ciise shaqadiisu waxay ahayd inuu dadka ku hago inay isaga rumaystaan (2:23; 6:14; 7:31; 10:42); badanaa dadku waxay arkaan mucjisooyinka Laakiin waxay diidaan inay rumaystaan (6:27; 11:47; 12:37).

MAWDUUC GAAR AH: YOOXANAA ADEEGSIGIISA FALKA “RUMAYS” (MAGACU waa dhif)

Ugu horrayn Yooxanaa erayga “rumays” wuxuu ku xidhayaa MEELEEYE

1. *eis* oo macnihiisu yahay “gudaha” qaab dhismeedka gaarka ahi wuxuu xoojinayaa rumaystayaasha oo isku halleeya Ciise
 - a. Magaciisa (Yooxanaa 1:12; 2:23; 3:18; 1 Yooxanaa 5:13)
 - b. Isaga (Yooxanaa 2:11; 3:15,18; 4:39; 6:40; 7:5,31,39,48; 8:30; 9:36; 10:42; 11:45,48; 12:37,42)
 - c. Aniga (Yooxanaa 6:35; 7:38; 11:25,26; 12:44,46; 14:1,12; 16:9; 17:20)
 - d. Ka uu soo diray (Yooxanaa 6:28-29)
 - e. Wiilka (Yooxanaa 3:36; 9:35; 1 Yooxanaa 5:10)
 - f. Ciise (Yooxanaa 12:11)
 - g. Iftiinka (Yooxanaa 12:36)
 - h. Ilaah (Yooxanaa 12:44; 14:1)
2. *ev* “dhex” sida Yooxanaa 3:15 (Markos 1:15)
3. Xaaladda aanu la soconin meeleyuhu (Yooxanaa 4:50; 1 Yooxanaa 3:23; 5:10)
4. *hoti*, oo macnihiisu yahay “rumayso inuu” waxaanay wataa waxa uu koobsanayo waxa la rumaynayaa. Tusaala ahaan
 - a. Ciise waa Kan Quduuska ah oo Ilaah (6:69)
 - b. Ciise waa Anigu (8:24)
 - c. Ciise wuxuu ku dhex jiraa Aabbaha, oo Aabbuhuna isagu ku dhex jiraa (Yooxanaa 10:38)
 - d. Ciise waa Masiixa (Yooxanaa 11:27; 20:31)
 - e. Ciise waa Wiilka Ilaah (Yooxanaa 11:27; 20:31)
 - f. Ciise waxa soo diray Aabbaha (Yooxanaa 11:42; 17: 8,21)
 - g. Ciise wuxuu la mid yahay Aabbaha (Yooxanaa 14:10-11)
 - h. Ciise wuxuu ka yimid Aabbaha (Yooxanaa 16:27,30)
 - i. Ciise wuxuu naftiisa ku magacaabay magacii axdiga ee Aabbaha, “Isaga”(Yooxanaa 8:24; 13:19).

Rumaysadka kitaabiga ahi wuxuu ku dhex jiraa shakhsiga iyo farriinta labadaba! Waxa caddayn u ah adeecitaan, jacayl, iyo quduusnaan.

2:24-25 intani waa isku hal jumlad qudha Giriigga. Erayga muhiimka ah ee “iskumay hallayn” waxa macno ahaan loogu adeegsaday iyadoo la sheegayo shuqullada iyo fikirka Ciise. Waxa macnaheeda loogala jeeday in ka badan ka jawaab celin caadifadaysan oo keliya. Sidoo kale jumladdani waxay sheegaysaa, aqoonta Ciise u leeyahay wixii shar iyo khayr ku jira qalbiyada dadka (ka tarjumayaa Ogaanshaha Ilaah, Bilowgii 6:11-12, 13; Sabuurka 14:1-3). Baaragaraafka waxa tusaale ahaan cutubka 3 ugusoo qaatay Nikedemos. Xitaa “Wadaadku” wuxuu ahaa midaan awooddiisa ku garan inuu Ilaah aqbalay iyo inkale. Haddaba, xaqnimadu waxay ku timaaddaa oo keliya rumaysadka Ciise (Rooma 1:16-17; 4).

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu Ciise biyaha uugu bedelay khamri? Maxay calaamad u tahay?
2. Sheeg dhaqamadii guurka ee wakhtigii Ciise
3. Ma sawiri kartaa qaabka uu ahaa macbadkii Herodos? Ma muujin kartaa goobihii ganacsiyada ee wax lagu iibin jiray?
4. Maxay injiillada kale u diiwaan gelin waayeen daahirinta macbada ee ugu horraysay?
5. Ciise miyuu sii sheegay burburitaanka macbadka Herodos?
6. Qeex oo sharax erayga Giriigga ah ee laga tarjumay “rumays,” “iimaan” iyo “isku hallays.”

YOOXANAA 3

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ciise iyo Nikodemos 3:1-15	Dhalashada Cusub 3:1-21	Ciise iyo Yuhuuddii 3:1-10	Ciise iyo Nikodemos 3:1-2 3:3 3:4 3:5-8 3:9 3:10-13 3:11-15 3:14-17	La sheekaysigii Nikodemos 3:1-18 3:9-21
3:16-21		3:16 3:17-21	3:18-21	
Ciise iyo Yooxanaa Baabtiisaha 3:22-30	Yooxanaa Baabtiisuhu wuxuu ammaanay Ciise 3:22-36	Markhaatiga dheeraadka ah ee Yooxanaa 3:22-24 3:25-30	Ciise iyo Yooxanaa 3:22-24 3:25-36 3:27-30	Yooxanaa oo ugu horrayntiiba ka markhaati kacay 3:22-24 3:25-36
Kan Samada ka yimaadda 3:31-36		3:31-36	Kan Samada ka yimaadda 3:31-36	
1:16-17				
Sharka aadanaha 1:18-23 1:24-32	Cadhada Ilaah u qabo xumaan falayaasha 1:18-32	Xukunka Ilaah ee denbiga 1:18-23 1:24-25 1:26-27 1:28-32	Sharka aadanaha 1:18-23 1:24-25 1:26-27 1:28-32	Cadhada Ilaah u qabo xumaan falayaasha 1:18-25 1:26-27 1:28-32

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

NASB (UPDATED) TEXT: 3:1-3

¹Waxaa jiray nin ka mid ahaa Farrisiinta oo la odhan jiray Nikodemos oo Yuhuudda taliye u ahaa. ²Isagu habeenkuu u yimid Ciise, wuxuuna ku yidhi, Macallimow, waannu og nahay inaad tahay macallin ka yimid Ilaah, waayo, ninna ma samayn karo calaamooyinkan aad samayso haddaan Ilaah la jirin. ³Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Runtii, runtii waxaan kugu leeyahay, Qof haddaanu mar kale dhalan, boqortooyadii Ilaah arki kari maayo.

3:1 “Farrisiinta” asalka kooxdan isugu jirtay siyaasiyiinta iyo culimadu wuxuu u noqonayaa wakhtigii Makabiyaan. Magacoodunu waxa macnihiisu yahay “kuwii la faquuqay.” Waxay ahaayeen kuwo u go’san ilaalinta sharciga Ilaah iyo sharraxaadda dhaqanka (Talmuud). Sida maanta oo kale ayaa kuwo iyaga ka mid ahi waxay ahaayeen kuwo si runa u ahaa dadkii axdiga (Nikodemos, Yuusufkii reer Arimaatiya), laakiinse kuwo iyaga ka mida ayaa waxa ay ahaayeen kuwo isu haystay in iyagu ay saxsanyihiin xaqnimona leeyihiin (Ishacyaah 6:9-10; 29:13). Furuu waxa weeyi qalbiga! “axdiga cusubi” (Yeremyaah 31:31-34) wuxuu diiradda saarayaa ujeeddada gudaha (qalbi cusub, maan cusub, sharciga ku qoran qalbiga). Waxyaalaha aadanuhu qabtaani waxa ay hadiyo goor muujinaysa inaanay ahayn mid wax ku filnaan karta. Gudniinka qalbiga ee ku qoran Sharciga Kunoqoshadiisa 10:16; 30:6 wuxuu tusaale u yahay rumaysadka shakhsi ahaaneed ee uu ku dheehan yahay addeecitaanku.

Isku qiimaynta diinta iyo waxyaalaha la xidhiidhaa waxa weeyi kuwo badanaa fool xun. Fiiguna waa ahaado mid kusoo baxa jacayl iyo rumaysad. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Farrisiinta ee 1:24.

▣ **“Nikodemos”** Waxa la yaab leh nin Yuhuudi ah oo dhex jooga Falastiin inuu lahaado magac Giriig ah (sida Filibos iyo Andros, 1:40, 43), kaasi oo macnihiisu uu yahay “jebiyaha dadka” (7:50; 19:39).

▣

NASB, NKJV	“Yuhuudda taliye u ahaa”
NRSV, NJB	“hogaamiye Yuhuudda u ahaa”
TEV	“hogaamiye Yuhuuda”

Macnaha aan halkan ka dhex arki karno ayaa waxa uu yahay xubin ka mida guddigii sare ee Sanhadariinka (macnaha kalee laga fahmi karaana waa hogaamiye sinagoog), oo ka koobnaa toddobaatan xubnood oo ahaa dadka ugu sarraysa dadkii Yuhuudda ahaa ee ku sugnaa Yerusalaam. Waxay ahaayeen awood ay xadideen

Roomaanku, hase ahaatee dadka Yuhuudda ah waxay u lahaayeen muhiimad wayn. Eeg Mawduuca Gaarka ah ee xagga hoose.

Waxay haddaba u muuqataa in Yooxanaa uu Nikodemos u adeegsanayo, sidii isaga oo metalayay Yuhuuddii xagjirka ahayd ee qarnigii koobaad. Waxayna ahaayeen kuwo loo malaynayay inay u yimaaddeen arrimo ruux ahaaneed. Rumaysadka Ciise Masiix oon ahayn addeecitaanka sharciyada (xitaa sharciyada cibaadada ah, Kolosay 2:16-23), iyo cirqiga ama asalku (8:31-59), wuxuu qeexayaa sida looga mid noqon karo boqortooyada Ilaah. Ilaah hadiyadda uu inagu siiyay Masiixa oo keliya ayaa ah albaabka aqbalitaanka, mana aha diimaha dadku samaystaan addeecitaankooda. Nikodemos inkasta oo uu aqoonsaday in Ciise yahay macallin xagga Ilaah ka yimid, haddana taasi maaha mid keliya oo wax taraysa. Waxa loo baahan yahay in shakhsi ahana la isugu halleeyo Masiixa oo ah rajada keliya ee aadanaha leexday (1:12).

MAWDUUC GAAR AH: SANHEDRIINKA

I. Ilaaha warbixinta

- A. Axdiga Cusub laftiisa
- B. Falavius Josephus kitaabkiisa *Antiquities of the Jews*
- C. Qaybta Mishnah ee Talmuudka (Tractate “Sanhedrin”)

Nasiib darro Axdiga Cusub iyo Josephus ma waafaqsana qoraallada rabaaniyiinta, taasina waxay u muuqataa inay Yerusaaalem ka jireen labo Sanhedrin, mid waxa xukumi jiray wadaaddada sarsare oo wuxuu la tacaali jiray caddaaladda iyo waxyaalaha khuseeya, ka labaadna waxa maamuli jiray Farrisiinta iyo culimada kale, waxaanu la xidhiidhayay diinta iyo arrimaha dhaqanka. Si kastaba ha ahaatee, qoraallada rabaaniga ee taariikhdoodu u noqonayso 200 C.D. waxa ay tusinayaan xaalad dhaqameed oo jirtay markii Yerusaaalem ay ku dhacday gacantii taliyihii Roomaanka ee Tiitos, taariikhdu markay ahayd 70 C.D. Yuhuuddu waxa ay noloshoodii diin ahaaneed dib ugu aasaaseen magaalo la odhan jiray Jamniya (118 C.D.) kaddibna waxay u guureen Galiili.

II. Eraybixinta

Dhibaataada ka taagan magacaabitaanka qaab xukumeedkan ayaa waxa ay ahayd iyadoo lagu tilmaami jiray magacyo kala duwan. Waxa jiray magacyo kala duwan oo qaab xukumeedka Yuhuudda ay bulshadu ku kala magacaabi jireen.

- A. *Gerousia* – “gudi.” Wuxuu ahaa eraygii ugu da’da waynaa ee la adeegsaday dhammaadkii wakhtigii Aasiyaanka (Josephus kitaabkiisa *Antiquities* 12:3.3 iyo *II Maccabees* 11:27). Luukos ayaa ku adeegsaday Falimaha Rasuullada 5:21 “Sanhedrin.” Waxa haddaba laga yaabaa inay ahayd qaab loogu sharaxayay dadkii Giriigga ku hadlayay (*I Macc.* 12:35).
- B. *Synedrion* – “Sanhedrin.” Waxay ka koobantahay labo eray oo kala ah *syn*(wada) iyo *hedra*(fadhiisi). Waxa la yaableh eraygan oo Aramaatiga lagu dhex adeegsaday, laakiinse ka tarjumaya eray Giriig ah. Dhammaadii wakhtigii Makaabiyanka ayaa eraygan waxa loo oggolaaday in lagu dhex adeegsado gudigii Yuhuudda ee Yerusaaalem (Matayos 26:59; Markos 15:1; Luukos 22:66; Yooxanaa 11:47; Falimaha Rasuullada 5:27). Dhibku haddaba wuxuu imanayaa marka ereybixin tan lamida loo adeegsado meel ka baxsan Yerusaaalem (Matayos 5:22; 10:17).
- C. *Presbyterion* – “gudida odayaasha” (Luukos 22:66). Waxay ahayd qaab Axdiga Hore dhexdiisa loogu adeegsan jiray odayaasha qabiillada. Si kastabana ha ahaatee, waxa loo adeegsan jiray maxkamaddii sare ee Yerusaaalem (Falimaha Rasuullada 22:5).
- D. *Boule* – eraygan “gudi” waxa adeegsaday Josephus (*Wars* 2. 16.2; 5.4.2, laakiin maaha Axdiga Cusub) si uu u qeexo dhowr gudi xukun oo kala duwan: (1) golihii duqaytida ee Rooma; (2) maxkamadihii hoose ee Roomaanka; (3) maxkamaddii Yuhuudda ugu sarraysay ee Yerusaaalem; iyo (4) maxkamadihii hoose ee Yuhuudda. Yuusufkii reer Aramatiya haddaba waxa lagu sheegay inuu ahaa xubin ka mida qaabka eraygan (*bouleutes* oo macnihiisu yahay “gudoomiye” Markos 15:43; Luukos 23:50).

III. Horumarka Taariikh ahaaneed

Asal ahaan Cesraa ayaa loo sheegay inay hagaajiso Sangooga Wayn (Targum on Song of Songs 6:1) kaasi oo u muuqday wakhtigii Ciise inuu noqday Sanhedriinka.

- A. Mishnaha (Talmuud) ayaa sheegaya inay Yerusaaalem ka jireen labo maxkamadood (Sanh 7:1).
1. Mid ka kooban 70 (ama 71) xubnood (*Sand* 1:6 xitaa waxay sheegaysaa in Muuse Sanhedriinkii u horreeyay ku sameeyay Tirintii 11, cf. Tirintii 11:16-25).
 2. Mid ka koobnaa 23 xubnood (laakiin waxa laga yaabaa inuu ahaa sanagoog hoose)
 3. Kuwo kamida culimada Yuhuudda ayaa rumaysan inay jireen 23 xubno Sanhadriin oo ka jiray Yerusaaalem. Marka saddexdu wada kulmaana waxa la odhan jiray “Sanhadriinka Wayn” ee 71 ka xubnood (*Nasi* iyo *Av Bet Din*).
 - a. Hal wadaad (Sidduukiyiinta)
 - b. Hal sharci (Farrisiinta)
 - c. Hal laandheere (odayaasha)
- B. Wakhtigii musaafuriska, faracii Daa’uud ee soo laabanayay wuxuu ahaa Zerubbabel sidoo kalena faracii Haaruun ee soo noqonayay wuxuu ahaa Yashuuca. Markii Zerubbabel geeriyoodayna muujirin farac Daa’uud oo sii socon doonay, sidaasi darteedna xukunkii waxa loo dhaafay wadaaddada (I Macc 12:6) iyo odayaashii gudaha (Nexemyaah 2:16; 5:7).
- C. Doorkan wadaadadu ka qaadanayaan waxa wax ka qoray Diodorus 40:3:4-5 wakhtigii Hellenistic ga.
- D. Doorkan wadaadadu xukunka gacanta ku hayeeni wuxuu soconayay ilaa wakhtigii Selusiidh. Josephus ayaa wuxuu kagagasoo xiganayaa Aniochus III (223-187 C.H.) *Antiquities* 12. 138-142.
- E. Si Josephus sheegayo xukunkan wadaadadu wuxuu soconayay ilaa wakhtigii Makabiyaanka *Antiquities* 13.10.5-6; 13.15.5.
- F. Wakhtigii Roomanka xaakinkii Siiriya (Gabinius laga bilaabo 57-55 C.H.) ayaa aasaasay shan gobol “Senhadrin” (Josephus kitaabkiisa *Antiquities* 14.5.4; iyo *Wars* 1.8.5), laakiinse markii danbe Rooma ayaa baabtiisay (47 C.H.).
- G. Senhadriinku wuxuu muran siyaasadeed kula jiray Herodos (*Antiquities* 14.9.3-4) kaasi oo markii danbe ka takhalusay oo dilay badanaa intii maxkamadda ugu sarraysay (Josephus kitaabkiisa *Antiquities* 14.9.4; 15.1.2).
- H. Maamulkii Roomaanka (6-66 C.D.) Josephus wuxuu inoo sheegayaa (*Antiquities* 20.200,251) in markale Senhadriinku ay heleen awood tixgelin ah iyo saamayn (Markos 14:55). Waxa jiray saddex maxkamadood oo Axdiga Cusub lagu diiwaan geliyay halkasoo Senhadriinku uu hoos joogay maamulka wadaadka sare.
 1. Maxkamadayntii Ciise (Markos 14:53-15:1; Yooxanaa 18:12-23,28-32)
 2. Butros iyo Yooxanaa (Falimaha Rasuullada 4:3-6)
 3. Bawlos (Falimaha Rasuullada 22:25-30)
- I. Markii Yuhuudda la argigixiyay sanadkii 66 C.D. Roomaanku waxay baabiiyeen dadkii Yuhuudda ahaa iyo Yerusaaalem sanadkii 70 C.D. Senhadriinkana si ku meel gaadha ayaa loo xidhay, inkastoo Farrisiintii Jamniya ay isku dayeen inay keenaan shacrci cadaaladeed (*Beth Din*) oo ku salaysan diin nololeedka Yuhuudda (laakiin aan ahayn madani ama siyaasad).

IV. Xubinimada

- A. Meesha ugu horraysa ee kitaabku ku sheegayo maxkamaddii ugu sarraysay ee Yerusaaalem waxa ay tahay 2 Korintos 19:8-11. Wuxuu ka koobnaa (1) Laawiyiinta; (2) wadaadada; iyo (3) madaxda qoysaska (odayaasha, I Macc. 14:20; II Macc 4:44).
- B. Wakhtigii Makaabiyaanka waxa maamulayay (1) wadaadadii Sidduukiyiinta iyo (2) xeer beegtiddii hoose (I Macc 7:33; 11:23; 14:28). Goor danbe oo wakhtigan ah “culimada” (Sharci yaqaanada, badanaa Farrisiinta) waxa kusoo daray Aleksandar Jannayaas xaaskiisii Salome (76-67 C.H.). Waxa xitaa laga sheegay inay Farrisiinta ka dhigtay kooxda ugu muhiimsan (Josephus kitaabkiisa *Wars of the Jews* 1.5.2).
- C. Wakhtigii Ciise maxkamaddu waxay ka koobnayd
 1. Qoyska Wadaadada Sare
 2. Dadka shacabka ah ee hodanka ah qoyskooda
 3. Culimada (11:27; Luukos 19:47)

V. Maraajicda

- A. *Dictionary of Jesus and the Gospels*, IVP, pp. 728-732
- B. *The Zondervan Pictorial Encyclopedia of the Bible*, vol. 5, pp. 268-273
- C. *The New Schaff-Herzog Encyclopedia of Religious Knowledge*, vol. 10, pp. 203-204
- D. *The Interpreter's Dictionary of the Bible*, vol. 4, pp. 214-218

3:2 “habeenkuu” Rabbaaniyiinta ayaa waxay yidhaahdeen habeenkaasi wuxuu ahaa wakhtiga ugu wanaagsan ee la barto Sharciga maxaa yeelay muu jirin wax qasitaan keenaya. Waxa suurto gala Nikodemos inaanu rabin in lagu arko Ciise (iyo sidoo kale kuwa isaga la jooga) sidaasi aawadneena habeenimo ayuu u yimid.

Qoraallada Yooxanaa waxa lagula yaabi karaa sida fasiraaddu labo dhinac ugu muuqanayso. Haddaba, Yooxanaa dabecaddiisa ayaa waxay ahayd kala saarista iftiinka iyo mugdiga (eeg NET Bible, p. 1898, #7 sn).

▣ **“Macallimow”** Yooxanaa dhexdiisa middan macneheedu waa “macallin” (1:38; 4:31; Markos 9:5; 11:21). Waxyaalaha ka wareeriyay hogaamiyayaashii diinta waxa ka mid ahaa Ciise oo aan wax kusoo baranin dugsiyadii rabbaaniyiinta. Muu lahayn waxbarasho ku saabsan Talmuudka oo ka dambaysay middii sinagooga Naasereet.

▣ **“inaad tahay macallin ka yimid Ilaah”** waxa laga yaabaa middani inay ka tarjumayso waxsii sheegiddii Sharciga Kunoqoshadiisa 18:15, 18. Nikodemos wuxuu aqoonsaday shaqada iyo erayada Ciise, laakiin taas macneheedu muu ahayn inuu ruux ahaan mid xagga Ilaah ku xaq ah.

▣ **“haddaan Ilaah la jirin.”** Waa hadal sii adkayn ah oo tusinay inay middani tahay xaqiiqo muuqata.

3:3, 5, 11 “Runtii, runtii” suugaan ahaan macneheedu wuxuu noqonayaa “Aamiin, aamiin.” Waxaanay ka imanaysaa erayga Axdiga Hore ee “rumays.” Waxa asalkeeduna ka imanayaa “inaad wax hubto.” Ciisena wuxuu u adeegsaday xoojinta hadalkiisu. Sidoo kalena waxa markii danbe loo adeegsaday iyadoo lagu muujinayo runta. Labanlaabka ugu horraynta hadalka ahi waxa uu caan ku yahay Yooxanaa Injiilkiisa. Ereyadan haddaba, lagusoo celcelinayaa waxay yihiin kuwo ka muuqda wada hadalkii Ciise iyo Nikodemos. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Aamiin ee 1:51.

3:3 “Qof haddaanu” sidoo kale tanina waa hadal shuruud xambaarsan, sida hadalka Nikodemos ee 3:2.

▣
NASB, NKJV, TEV “mar kale dhalan”
NRSV, NJB “aanu xagga sare ka dhalan”

Waa hadal tilmaamaya in qofka uu falkani ku dhaco. Erayga (*anthen*) wuxuu macnihiisu noqon karaa

1. “jidh ahaan marlabaad dhasho”
2. “kasoo dhasho bilowga” (Falimaha Rasuullada 26:4)
3. “uu xagga sare kasoo dhasho” oo ah macnaha ku haboon aayaddan (3:7, 31; 19:11)

Middani waa tusaale kale oo ah Yooxanaa adeegsigiisa erayada labada macnood wata, kuwaasi oo labaduba run yihiin (Bauer, Arndt, Gengrich iyo Danker kitaabkooda *A Greek-English Lexicon of the New Testament*, p. 77). Sida ku cad aayadda 4, Nikodemos wuxuu u fahmay ikhtiyaarka #1. Yooxanaa iyo Butros (1 Butros 1:23) waxay middan u adeegsanayaan tusaalaha badbaadada halka Bawlosna uga adeegsanayo la jiritaan. ujeedadu markaas waxay tahay sida shaqada Aabuhu tahay (1:13). Badbaadadu waa hadiyadda iyo shuqulka Ilaah (1:12-13; Rooma 3:21-24; 6:23; Efesos 2:8-9).

▣ **“arki kari maayo.”** Cibaaradan ama erayadani waxay la mid yihiin kuwa aayadda 5 ee “ma gali karo.”

▣ **“boqortooyadii Ilaah”** ereyadan labo jeer oo keliya ayaa lagu dhex adeegsaday Yooxanaa (aayadda 5). Erayadani waxay fure u yihiin Injiillada kale. Ciise wacdimihiisii ugu horreeyay iyo kuwii ugu danbeeyay, iyo xitaa badanaa masaalladiisii mawduucan ayuu kaga hadlayaa. Waxa aanay sheegayaan xukunka Ilaah ee uu xukumi doono qalbiyada dadka imika. Waxa haddaba la yaableh Yooxanaa oo ereyadan adeegsanaya labo jeer oo

keliya (kumana adeegsanayo masaallada Ciise). Eeg Mawduuca Gaarka ah ee hoos ku xusan. Yooxanaa erayga muftaaxa ama furaha u ahi tusaale ahaan waa “nolosha weligeed ah.”

Erayadani markaas waxay la xidhiidhaan dhammaadka wakhtiga ee ku saabsan waxbarisha Ciise. Fiqi is khilaafsan ayaa Yuhuuddu ka qabeen fikirka labada da’ood, oo ahaa da’ada wakhtigan taagan ee sharka ah iyo da’da amaba casriga xaqnimada ee ku iman doona Masiixa. Yuhuuddu waxay filayeen inuu iman doono mid Ruuxa ugu xoogaysan sida ciidan oo kale (sida xaakinnada Axdiga Hore). Labada imaanshiyo ee Ciise waxay samaynayeen labada casri. Boqortooyada Ilaahna waxay labo u qaybisay taariikhda aadanaha waana markii Ciise ku dhashay Beytlaxam. Si kastaba ha ahaatee, Ciise uma imanin isaga oo ciidan ahaan ugu guulayasanaya Muujintii 19, laakiinse wuxuu u imanayay isagoo ah Adeege Silcaya (Ishacyaah 53) iyo hogaamiye is hoosaysiin leh (Sekeryaah 9:9). Sidaas darteedna Boqortooyada waa midda lagu sheegay (Matayos 3:2; 4:17; 10:7; 11:12; 12:28; Markos 1:15; Luukos 9:9, 11; 11:20; 21:31-32) laakiinse lama dhammays tirin (Matayos 6:10; 16:28; 26:64).

Rumaystayaasha haddaba waxay ku dhexnoolyihiin labadan casri. Waxay haystaan nolosha sarakicista, laakiin ilaa hadda jidh ahaan way dhimanayaan. Waxa laga xoreeyay awoodda denbiga, laakiinse ilaa hadda way denbaabayaan. Waxay horeba ugu dhex noolyihiin nolosha danbe, laakiinse ilaa hadda maya oo way hadhsanyahay!

Qoraal muhiim ah oo ku saabsan arrintan horeba loo helay balse weli ah ee Yooxanaa ku sugan, ayaa waxa laga dhex heli karaa Frank Stagg kitaabkiisa *New Testament Theology*:

“Injiilka Yooxanaa wuxuu aad uga hadlayaa wax ku saabsan mustaqbalka iman doona (14:3, 18 f, 28; 16:16, 22) waxaanu si cad uga hadlayaa sarakicista iyo qiyaamaha (5:28 f, ; 6:39 f, ; 44, 54; 11:24; 12:48); ilaa haddana Injiilkan afraad, nolosha weligeed ah, qiyaamaha, iyo sarakicistu waxa weeyi xaqiiqooyin dhammaantood ku jira (3:18 f, ; 4:23; 5:25; 6:54; 11:23 ff, ; 12:28, 31; 13:31 f, ; 14:17; 17:26)” (p. 311).

MAWDUUC GAAR AH: BOQORTOYADA ILAAH

Axdiga Hore dhexdiisa YHWH waxa loo aqoonsanaa Boqorka Israa’iil (1 Samuu’eel 8:7; Sabuurka 10:16; 24:7-9; 29:10; 44:4; 89:18; 95:3; Ishacyaah 43:15; 44:4,6) Masiixana waxa loo haystay boqorka tusaalaha ah (Sabuurka 2:6; Ishacyaah 9:6-7; 11:1-5). Markii Ciise ku dhashay Beytlaxam (6-4 C.H) Boqortooyada Ilaah waxay qaybisay taariikhda aadanaha iyadoo keentay awood cusub iyo cafis (axdi cusub, Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:27-36). Yooxanaa Baabtiisuhu wuxuu kusii baqayay dhawaanshaha Boqortooyada Ilaah (Matayos 3:2; Markos 1:15). Ciisena wuxuu si cad u sheegay in Boqortooyada Ilaah ay isaga dhexdiisa iyo waxbaristiisa ku jirto (Matayos 4:17,23; 9:35; 10:7; 11:11-12; 12:28; 16:19; Markos 12:34; Luukos 10:9,11; 11:20; 12:31-32; 16:16; 17:21). Sidoo kalena boqortooyada waa mustaqbal (Matayos 16:28; 24:14; 26:29; Markos 9:1; Luukos 21:31; 22:16,18).

Injiillada Markos iyo Luukos waxa siman erayada “Boqortooyada Ilaah.” mawduucan haddaba guud ahaan ka muuqda waxbarista Ciise waxa uu koobsanayaa boqortooyada Ilaah ee qalbiyada dadka xukumaysa hadda iyo iyada oo maalin maalmaha kamida dunida oo dhan xukumi doonta. Waxa middani ka muuqataa tukashadii ciise sida ku sugan Matayos 6:10. Matayos wuxuu wax u qorayay Yuhuudda, sidaasi darteedna wuxuu doorbiday inaanu adeegsan magaca Ilaah (Boqortooyada Janada), halka Markos iyo Luukos uga qorayeen kuwa aan Yuhuudda ahayn, sidaasi darteedna waxay adeegsadeen magaca Ilaahnimada.

Erayadani haddaba waxay aad uga muuqdaan Injiillada. Ciise wacdimihiisii ugu horreeyay iyo kuwii ugu danbeeyay, iyo badanaa masaalladiisa, waxay la tacaalayeen mawduucan. Waxaanay sheegaysaa xukunka Ilaah ee uu qalbiyada ku xukumayo imika! Waxaana layaab leh Yooxanaa oo ereyadan labo jeer oo keliya adeegsanaya (kumana sheegayo masaallada Ciise). Yooxanaa injiilkiisa erayga “nolosha weligeed ah” ayaa muftaax ahaan tusaale loogusoo qaadan karaa.

Erayadani waxay tilmaamayaan labada imaatin ee Masiixa. Axdiga Hore wuxuu diiradda saaray oo keliya imaatinka Masiixa Ilaah oo ah, mid awood leh waxna xukumaya, laakiin Axiga Cusubi wuxuu sheegayaa inuu markii hore yimid, isaga oo ah Adeege Silcaya sida ku qoran Ishacyaah 53 iyo boqor is hoosaysiin leh, sida uu dhigayo Sekeryaah 9:9. Labadii casri ee Yuhuudda, casrigii xumaanta iyo casriga xaqnimada badh ahaan ayaa la qariyay. Ciise hadda wuxuu xukumaa qalbiyada rumaystayaasha, laakiinse maalin maalmaha ka mida wuxuu xukumi doonaa khalqiga oo dhan. Wuxuu u iman doonaa sidii Axdiga Hore usii sheegay! Rumaystayaashuna waxay ku dhex noolyihiin “horeda” iyo “welida” boqortooyada Ilaah (Gordon D. Fee iyo Douglas Stuart kitaabkooda *How to Read The Bible For All Its Worth*, pp. 131-134).

NASB (UPDATED) TEXT: 3:4-8

⁴Nikodemos wuxuu ku yidhi, Sidee baa nin mar kale u dhalan karaa isagoo duq ah? Miyuu mar kale uurkii hooyadiis geli karaa oo ka dhalan karaa? ⁵Ciise baa ugu jawaabay, Runtii, runtii, waxaan kugu leeyahay, Qof haddaanu ka dhalan biyo iyo Ruuxa, boqortooyadii Ilaah geli kari maayo. ⁶Waxa jidhka ka dhashaa waa jidh, waxa Ruuxa ka dhashaana waa ruux. ⁷Ha la yaabin haddaan ku leeyahay, Waa inaad mar kale dhalataan. ⁸Dabayshu way u dhacdaa meeshay doonto, waxaadna maqashaa xiinkeeda, laakiin ma ogid meeshay ka timaado iyo meeshay u kacdo; waa sidaas oo kale qof kasta oo Ruuxa ka dhasha.

3:5 “Qof haddaanu ka dhalan biyo iyo Ruuxa” waa jumlad kale oo shuriidi ku xidhantahay. Waxa laga yaabaa inuu jiray farqi (caan ku ah qoraallada Yooxanaa) u dhexeeya

1. Jidh ahaan iyo ruux ahana
2. Dhulka iyo samada
3. Farqigan waxa lagu macneeyay aayadda 6 dhexdeeda
4. Aragtiyaha macnaynta “biyuhu” waxa weeyi
5. 1.Rabbaaniyiintu waxay u isticmaaleen biyaha ragga ee manida
6. Biyaha ilmaha dhasha
7. Baabtiiskii Yooxanaa ee tawbadkeenka calaamadda u ahaa (1:26; 3:23)
8. Asal ahaantiisa Axdiga Hore oo macnihiisu yahay xafladaha ruuxiga ah (Yexesqeel 36:25-27).
9. Baabtiiska Masiixiyiinta (inkastoo aanu Nikodemos sidaas u fahmin, ugu horrayna waxa sheegay Justin iyo Irenaeus)

Macnaha aragtida #3 ee ah biyaha Yooxanaa Baabtiisaha iyo erayada ku saabsan Masiixa Ruuxa Quduuska ah wax ku baabtiisaya, ayaa ah macnaha loogala jeedo ee ugu saxsanaan kara. Dhalashada qoraalka ka muuqataa waa tusaale oo keliya, mana aha inuu fahanka qaldan ee Nikodemos uu ka muuqda fasiraadda. Sidaasi darteedna aragtida #1 maaha mid habboona. Inkasta oo Nikodemos aanu fahmin erayada Ciise ee ku saabsan baabtiiska Masiixiyiinta, Rasuul Yooxanaa ayaa middan ku diidaya erayada taariikh ahaaneed ee Ciise (aayadaha 14-21). Aragtida #2 waxay waafaqaysaa Yooxanaa dhexjoogitaankiisa kor iyo hoos, oo ah Ilaah oo kor iyo hoosba jooga maamulaya. Qeexitaanka eraydan waxa laga yaabaa inay kala saarayaan (#1 ama #2) ama ay dheelli tarayaan (#4).

D. A. Carson ayaa kitaabkiisa *Exegetical Fallacies*, wuxuu ku sheegayaa ikhtiyaar kale: oo ah in labada erayba tilmaamayaan dhalasho keliya, waana dhalashada ka muuqata Yexesqeel 36:25-27, oo tilmaamaysa “axdiga cusub” ee Yeremyaah 31:31-34 (p. 42).

F. F. Bruce, kitaabkiisa *Answers to Questions*, ayaa sidoo kale hadalka maldahan ee Yexesqeel ee Axdiga Hore, wuxuu u arkaa inay ka dambeeyaan erayada Ciise. Waxa laga yaabaa inay marjic u ahayd baabtiiska, kaasi oo Nikodemos u magacaabay inuu macallinku qabanayo. (p. 67).

▣ **“boqortooyadii Ilaah”** mid ka mida qoraal gacmeedyadii hore ee Giriigga (MS a) iyo kuwo badan oo ka mida wadaadadii kaniisadaha, ayaa haystay “boqortooyada janada” oo guud ahaan uu adeegsanayo Injiilka Matayos. Si kastaba ha ahaatee, erayada “Boqortooyada Ilaah” waxay kusoo arooraysaa aayadda 3 (aayadda 3 iyo 5 waa meesha keliya ee ereyadani ka muuqanayaan injiilka Yooxanaa). Yooxanaa wuxuu wax u qorayay kuwa aan Yuhuudda ahayn (sida Markos iyo Luukos oo kale), mana adeegsanayo magacyada Yuhuuddu Ilaah u adeegsan jireen.

3:6 markale waxa weeyi dhexjoogitaanka (kor iyo hoos) waana ku caan Yooxanaa (aayadda 11).

3:7 “adigu ..idinku” marka koobaad waa keli, waxaanay tilmaamaysaa Nikodemos, laakiin marka labaad waa jamac, waxaanay tilmaamaysaa dhammaanba aadanaha (waxay la mid tahay kelida iyo jamaca aayadda 11). Mid ayaa isku dayay inuu u tarjumo tilmaamista cirqiga Yuhuudda (4:12; 8:53). Yooxanaa qoraalkiisa wuxuu qoray dhammaadkii qarnigii koobaad, waxaana cad inuu marwalba kasoo horjeeday Gonotiyiinta iyo ku faanitaankii cirqiga Yuhuudda.

▣ **“inaad”** falka Giriigga ah ee *dei* (lit “lagama maarmaan” (BAGD 172), fal jooga oo shaqayana) waxa cutubka 3 lagu dhex adeegsaday saddex jeer (aayadaha 7, 14, 30). Waxay tusinaysaa in taasi tahay qorshaha Ilaah ee hore loogu soconayo (4:24; 9:4; 10:16; 12:34’ 20:9).

3:8 waxa jira xidhiidh ka dhexeeya erayga Cibraaniga (iyo Aramaatiga) ah ee (*ruach*) iyo erayga Giriigga ah ee (*pneuma*) kuwaasi oo macnohoodu yahay “dabayl,” “neef,” iyo “ruux.” Muhiimaddu waxay tahay dabaysha oo haysata xorriyad, sidoo kalena Ruuxu waa sidaas. Qofna ma arko dabaysha, laakiin wuxuu arkaa saamaynteeda; Ruuxuna waa sidaas oo kale. badbaadadu maaha mid gacanta aadanaha ku jirta, balse waxay maamulaya Ruuxa (Yexesqeel 37). Waxaana suurto gala in aayadaha 5-7 ay xaqiiqadan oo kale ka tarjumayaan. Badbaadanuna waxay ka koobantahay bilowga Ruuxa (6:44, 65) iyo rumaysadka/towbadkeenka ah ka jawaab celinta qofka (1:12; 3:16, 18).

Injiilka Yooxanaa wuxuu si gaara diiradda u saarayaa qofka iyo shaqada Ruuxa (14:17, 25-26; 16:7-15). Wuxuu arkayaa casriga cusub ee xaqnimada oo ah casriga Ruuxa Ilaah.

Aayadda 8 waxay adkaynasaa sababta ay dadka qaar u rumaystaan marka ay wax arkaan ama maqlaan halka kuwo kalana aanay sidaas ka yeelin. Yooxanaa haddaba, wuxuu sheegayaa inaan qofna rumaysan karin ilaa uu taabto Ruuxu (1:13; 6:44.65), aayaddanina fahankaas ayay xoojinaysaa. Si kastaba ha ahaatee, su’aasha amaba jawaabta axdigu, ilaa hadda waxay u muuqataa taabashada Ruuxa ee qofwalba. Maxay dadka qaar u diidaan rumaysashada qarsoodiga wayn. Waa markasta oo aan weynaado, markasta oon Kitaabkayga barto, markasta oo dadka Ilaah aan u adeego, markasta oo qarsoodiga nolosha aan wax ka qoro. Dhammaanteen waxaan ku dhex noolnahay mugdiga ceeryaanmada (1 Korintos 13:12) aadanaha caasiyiinta ah! markasta oo si kala aan wax u sharaxno, maaha mid ka muhiimsan isku hallaynta Ilaah ee loo marayo Masiixa. Ayuub weligiis muu odhan “sabab”!

MAWDUUC GAAR AH: NEEF, DABAYL, RUUX

Erayga Cibraaniga ah ee *ruach* (BDB 924) iyo ka Giriigga ah ee *pneuma* (Yooxanaa 3:5,8) waxa macnohoodu noqon karaa “ruux,” “neef,” ama “dabayl” (Yooxanaa 3:5,8). Ruuxu wuxuu marwalba la jiray abuurka (Bilowgii 1:2; Ayuub 26:13; Sabuurka 104:29-30; 147:14-18). Axdiga Hore si cad umuu qeexin xidhiidhka ka dhexeeya Ilaah iyo Ruuxa. Sida ka muuqata Ayuub 28:26-28; Sabuurka 104:24 iyo Maahmaahaydii 3:19; 8:22-23 Ilaah wuxuu adeegsaday xikmad si uu waxwalba u aburo. Axdiga Cusub dhexdiisa Ciise wuxuu ku sheegay inuu yahay adeegaha Ilaah ee abuurka (Yooxanaa 1:1-3; 1 Korintos 8:6; Kolosay 1:15-17; Cibraaniyada 1:2-3). Sida badbaadada oo kale, ayaa abuurkana saddexda shakhsiyadood ee Ilaahnimadu ugu wada jiraan. Bilowgii 1 laf ahaantiisuna muu xoojinin sabab labaad.

NASB (UPDATED) TEXT: AAYADAHA 3:9-15

⁹Nikodemos ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Sidee baa waxyaalahaas u noqon karaan? ¹⁰Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku yidhi, Ma waxaad tahay macallinka Israa’iil, oo aadan weliba waxyaalahaasna garanayn? ¹¹Runtii, runtii, waxaan ku leeyahay, Waxaannu naqaan ayaannu ka hadalnaa, oo waxaannu aragnay ayaannu ka marag furnaa, idinkuna maraggayaga ma aqbashaan. ¹²Haddaan wixii dunida idiin sheegay oo aad rumaysan weydeen, sidee baad u rumaysanaysaan haddaan waxa jannada idiin sheego? ¹³Ninna jannada kor uma tegin, kii jannada ka soo degay maahee, waana Wiilka Aadanaha oo jannada jooga. ¹⁴Sidii Muuse abeesadii kor ugu qaaday cidlada, sidaasoo kale Wiilka Aadanaha waa in kor loo qaado, ¹⁵in mid kastoo isaga rumaystaa uu lahaado nolosha weligeed ah.

3:9-10 Nikodemos waxay ahayd inuu u fahmo erayada Ciise uu iftiinka calaamadda uga dhigay (1) baabtiiskii Yuhuudda iyo (2) wacdintii Yooxanaa Baabtiisaha.

Waxa laga yaabaa inay middani ay ahayd kasitaan lagu tijaabinayo aqoonta aadanaha; xitaa qof Nikodemos oo kale ah, oo Yuhuudda hogaamiye u ahaa, muu fami karaynin waxyaalaha ruuxiga. Injiilka Yooxanaa haddaba waxa loo qoray kuwii ay kamidka ahaayeen Gonitic ga ee aqoonta aadanaha ku xoojinayay kuna macnaynayay badbaadada. Ciise oo keliya ayaa ah nuurka runta u ah (aayadda 9) dhammaan, umana aha koox gaara oo keliya.

3:11 “Waxaannu naqaan ayaannu ka hadalnaa” magac u yaallada jamaca ahi waxay sheegayaan Ciise iyo Rasuul Yooxanaa (aayadda 11) ama Ciise iyo Aabbaha, waana ka macno ahaan ugu haboon (aayadda 12). Injiilku maaha hadal madhan, laakiin waa waxyiga Ilaah!

▣ **“idinkuna maraggayaga ma aqbashaan.”** Yooxanaa marwalba erayga aqbal (*lambano*) iyo magac u yaalladiisa wuxuu u adeegsanayaa ujeedo fiqi ahaaneed oo ka tarjumaysa

1. Aqbalitaanka Ciise
 - a. diidmo (1:11; 3:32; 5:47)
 - b. oggolaansho (1:12; 3:11, 33; 5:43; 13:20)
 2. Aqbalitaanka Ruuxa
 - a. diidmo (14:17)
 - b. oggolaansho (7:39)
 3. Aqbalitaanka erayada Ciise
 - a. diidmo (12:48)
 - b. oggolaansho (17:8)
- Eeg Mawduuca Gaarka ah: 1:8

3:12 “haddaan.., haddaan” midda koobaad waa jumlad shuruudeed, u muuqata inuu qoraagu ujeedadiisa uga socdo. Midda labaadna waa jumlad shuruudeed kaalinta saddexaad ah oo loogala jeedo fal waxkasoo bixi karaan.

▣ **“idinku”** magac u yaalka iyo falkuba waa jamac. Waxa laga yaabaa in Nikodemos ay la socdoon kuwo ardaydiisa ah amaba Farrisiin markuu Ciise u yimid, amaba waxa laga yaabaa inay tahay hadal guud (Nikodemos oo metalaya koox) oo ku socda dhammaanba Yuhuudda aan rumaysadka lahayn, sida aayadda 7 iyo 11.

3:13 aayaddani waxay muujinaysaa muujinta uu Ciise ku muujiyay aabbaha isaga oo dhammays tiran gaarna ah (1:1-14). Waana tusaale kale oo Yooxanaa uu ka hadlayo: janada iyo dhulka, dhidh ahaan iyo ruuxi ahaan, asalka Nikodemos iyo asalka Ciise (1:51; 6:33, 38, 41, 50, 51, 58, 62). Aayaddani waxay sheegaysaa (1) Ilaahnimada; (2) jiritaankii hore; iyo (3) imaatinka qofka labaad ee Saddexmidnimada (wax ku saabsan Saddexmidnimada ka eeg Mawduuca Gaarka ah 14:26).

▣ **“Wiilka Aadanaha”** tani waa shakhsiyadda Ciise; manay lahayn jinsiyad; cudud military, iyo wixii Masiixa ay ka filayeen Yuhuuddii qarnigii koobaad. Erayadani waxay ka imanayaan Yexesqeel 2:1 iyo Sabuurka 8:4, halkaasi oo macno ahaan loogala jeedo “aadane” iyo Daanyeel 7:13 oo loogala jeedo Ilaahnimada. Erayadani haddaba waxay isku xidhayaan shakhsiyadda Ciise ee isugu jirta Ilaahnimada buuxda iyo aadananimada buuxda (1 Yooxanaa 4:1-3).

3:14-21 wax adag in la ogaado meesha uu wada sheekaysiga Ciise iyo Nikodemos ku istaagayo amaba meesha ay ka bilaabmayso faallada Rasuulku. Waxa suurto gal ah injiillada kale oo diiwaan gelinaya Ciise wacdintiisii guud ahaaneed, halka Yooxanaa uu ka diiwaan gelinayo wada sheekaysiyadii uu sida gaarka ah ula yeeshay xertiisa. Aayadaha 14-21 waxa loo dulmari karaa sidan:

1. aayadaha 14-15 waxay la xidhiidhaan Ciise
 2. aayadaha 16-17 waxay la xidhiidhaan Aabbaha
 3. aayadaha 18-21 waxay la xidhiidhaan aadanaha
- Xusuusnow in Ciise iyo Yooxanaa toona aanay saamaynayn xaqiiqada hadallada!

3:14 “sidii Muuse abeesadii kor ugu qaaday” Waxay u noqonaysaa Tirintii 21:4-9 oo tebinaysa khibraddii xukunka wakhtigii hore. Xaqiiqada gundhiga ahina waa in aadanuhu ay isku halleeyaan oo addeecaan erayga Ilaah, xitaa marka aanay si dhammays tiran u fahmin. Ilaah waxa uu reer Israa’iil siiyay dariiqo ay kaga badbaadi karaan qaniinyada abeesada waana haddii ay isaga rumaystaan oo keliya. Rumaysadkan waxa caddayn u ahaa addeecitaanka eraygiisa/ballanqaadkiisa (Tirintii 21:8).

▣ **“qaaday”** erayga Giriigga ah (8:28; 12:32, 34) waxa lagu tarjumay “aad u amaanis” (Falimaha Rasuullada 2:33; 5:31; Filiboy 2:9) iyo eray kale oo Yooxanaa labo macne u adeegsanayo (labo weji, 1:5; 3:3, 8). Sidii loogu ballan qaaday kuwa Ilaah eraygiisa rumaysta inaanay abeesada qaniinyadeedu waxba yeelin, ayaa kuwa rumaysta

erayga Ilaah (injiilka ku saabsan Masiixa, ka isku tallaabta lagu qodbay) iyo Ciise Masiix waxa laga badbaadin doonaa qaniinyada maska (sharka, denbiga) sharka (12:31-32).

3:15-18 “mid kastoo” (aayadda 15) “mid kastoo” (aayadda 16) “mid kastoo” (aayadda 18) Ilaah jacaylkiisu wuxuu u sugnaaday dhammaanba aadanaha (Ishacyaah 55:1-3; Yexesqeel 18:23, 32; Yooxanaa 1:29; 3:16; 6:33, 51; 2 Korintos 5:19; 1 Timoteyos 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; 2 Butros 3:9; 1 Yooxanaa 2:2; 4:14). Badbaadada waxa la siiyay dunidoo dhan, laakiin aqbalitaankeeda lama wada siinin!

3:15 “rumaysta” waa fal marwalba shaqayanaya. Rumaysadku waa kalsooni soconaysaa. Eeg fiirada gaarka ah 1:12 iyo Mawduucyada Gaarka ah ee 1:7 iyo 2:23.

▣ **“isaga”** maaha macneheedu xaqiiqada ku saabsan Ciise oo keliya, laakiinse waa xidhiidh shakhsi ahaaneed oo isaga lala yeesho. Badbaadadu waa (1) farriin la rumaysto; (2) qof la aqbalo oo la addeeco; iyo (3) nolol la mida ta qofkaasi noolyahay!

Qaabka naxwe ahaaneed ee halkani waa midaan caadi ahayn. Waa magac uyaalka oo uu la socdo meeleyaha *en* kaasi oo halkan oo keliya laga helayo Yooxanaa; caadi ahaan waa meeleyaha *eis*. Waxa suurto gala inay la xidhiidho “uu lahaado nolosha weligeeda” (*The New Testament in Basic English* oo uu leeyahay Harold Greenlee).

3:15, 16 “nolosha weligeed ah” erayga Giriigga ah ee (*zoe*) waxa lagu sheegay tayo iyo qiimi (5:24). Matayos 25:46 ayaa isla eraygan loogu adeegsaday iyadoo nolosha weligeeda lagu kala saarayo. Yooxanaa dhexdiisa *zoe* (33 jeer ayaa lagu adeegsaday badanaa cutubyada 5 iyo 6) hadiyo jeer (falka loo adeegsaday nolosha jidhka 4:50, 51, 53) waxay tilmaamaysaa sarakicista, nolosha danbe amaba nolosha Da’da Cusub, oo ah nolosha Ilaah laftiisa.

Yooxanaa gaar ayuu Injiillada kaga yahay sida uu u adkaynayo “nolosha weligeed ah.” Waana ujeedada ugu badan Injiilkiisa (3:15; 4:36; 5:39; 6:54, 68; 10:28; 12:25; 17:2, 3).

NASB (UPDATED) TEXT: 3:16-21

¹⁶Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah. ¹⁷Ilaah Wiilka uguma soo dirin dunida inuu xukumo dunida, laakiin wuxuu u soo diray inay dunidu ku badbaaddo isaga. ¹⁸Kii isaga rumaystaa ma xukumna, laakiinse kii aan isaga rumaysan, hore ayaa loo xukumay, maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan magaca Wiilka Ilaah oo keliya oo dhashay. ¹⁹Kanu waa xukunka, nuurka ayaa dunida yimid, dadkiise waxay nuurkii ka jeclaadeen gudcurka, maxaa yeelay, shuqulladoodu shar bay ahaayeen. ²⁰Nin kastoo shar falaa nuurkuu nebaadaa, umana yimaado nuurka, si aan shuqulladiisa loogu canaan. ²¹Laakiinse kii runta falaa, nuurkuu yimaadaa si shuqulladiisu u muuqdaan in Ilaah laga sameeyey.

3:16 “Ilaah intuu dunida jacayl u qabay” waxa weeyi fal dhacay oo hore loo dhamays tiray wakhtigii tegay (Ilaah wuxuu soo diray Ciise). Aayadaha 16-17 ayaa waxa ay ka hadlayaan ugu horraynba jacaylka Aabbaha (1 Yooxanaa 4:7-21, gaar ahaan aayadaha 9-10). Erayga ah “jeclaaday” waa *agapaa* inbadanna laguma isticmaalin Giriigii hore. Kaniisaddii horena way qaadatay oo waxay u samaynaysay macno gaar ah. Macnayaal gaar ah ayaa loogu adeegsaday jacaylka Aabbaha iyo kan Wiilka, laakiinse si diidmo ah ayaa loogu adeegsaday jacaylka aadanaha (3:19; 12:43; 1 Yooxanaa 2:15). Fiqi ahaan waxa ay isku dhow yihiin *hesed* Axdiga Hore dhexdiisa, taasi oo macneheedu yahay axdiga Ilaah iyo jacaylkiisa. Luqada Koine ee Giriigga wakhtigii Yooxanaa waxa isku macno samaynayay *agapao* iyo *phileo* (isbarbar dhig 3:35 iyo 5:20).

Fasirayaashu dhamaantood waa inay maskaxda ku hayaan in dhammaanba erayada loo adeegsaday Ilaah oo aadanaha jeclaaday. Waxa aan adeegsanay erayada aan dunideenna ku isticmaalno, sida dareenkeenna, taariikhda iyo waxwalba, inaga oo isla erayadaasna Ilaah dareenkiisa ku tilmaanna. Haddaba, dhamaanba erayada aadanuhu adeegsadaani waxay yihiin uun tusaale. Waxa la inoo muujiyayna waxa weeyaan run, laakiin maaha wax xadidan. Aadanaha leexdayna maaha mid wada ogaan kara xaqiiqada aan xadaysnayn.

MAWDUUC GAAR AH: ILAAH OO LOO TILMAAMAY SIDA AADANAHA

- I. Luqada noocan ahi waxay caan ku tahay Axdiga Hore
 - A. Qaybaha jidhka
 1. indhaha – Bilowgii 1:4,31; 6:8; Baxniintii 33:17; Tirintii 14:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 11:12; Sekaryaah 4:10
 2. gacmaha – Baxniintii 15:17; Tirintii 11:23; Sharciga Kunoqoshadiisa 2:15
 3. gacan – Baxniintii 6:6; 15:16; Tirintii 11:23; Sharciga Kunoqoshadiisa 4:34; 5:15
 4. dhegaha – Tirintii 11:18; 1 Samuu’eel 8:21; 2 Boqorradii 19:16; Sabuurka 5:1; 10:17; 18:6
 5. weji – Baxniintii 32:30; 33:11; Tirintii 6:25; Sharciga Kunoqoshadiisa 34:10; Sabuurka 114:7
 6. far – Baxniintii 8:19; 31:18; Sharciga Kunoqoshadiisa 9:10; Sabuurka 8:3
 7. cod – Bilowgii 3:8,10; Baxniintii 15:26; 19:19; Sharciga Kunoqoshadiisa 26:17; 27:10
 8. lug – Baxniintii 24:10; Yexesqeel 43:7
 9. qaabka aadanaha – Baxniintii 24:9-11; Sabuurka 47; Ishacyaah 6:1; Yexesqeel 1:26
 10. Malaga Rabbiga – Bilowgii 16:7-13; 22:11-15; 31:11,14; 48:15-16; Baxniintii 3:4,13-21; 14:19; Xaakinnadii 2:1; 6:22-23; 13:3-22
 - B. falalka jidh ahaaneed
 1. hadalka oo samaynaya abuurka – Bilowgii 1:3,6,9,11,14,20,24,26
 2. socodka beer Ceeden dhexdeeda – Bilowgii 3:8; 18:33; Xabquuq 3:15
 3. xidhitaanka albaabka doonnidii Nuux – Bilowgii 7:16
 4. urinta allabariga – Bilowgii 8:21; Laawiyiintii 26:31; Caamoos 5:21
 5. soo daadegista – Bilowgii 11:5; 18:21; Baxniintii 3:8; 19:11,18,20
 6. aasiddii Muuse – Sharciga Kunoqoshadiisa 34:6
 - C. caadifadaha aadanaha
 1. towbad keen – Bilowgii 6:6,7; Baxniintii 32:14; Xaakinnadii 2:18; 1 Samuu’eel 15:29,35; Caamoos 7:3,6
 2. cadho – Baxniintii 4:14; 15:7; Tirintii 11:10; 12:9; 22:22; 25:3,4; 32:10,13,14; Sharciga Kunoqoshadiisa 6:5; 7:4; 29:20
 3. hinaasenimada – Baxniintii 20:5; 34:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 4:24; 5:9; 6:15; 32:16,21; Yashuua 24:19
 4. nacayb – Laawiyiintii 2:23; 26:30; Sharciga Kunoqoshadiisa 32:19
 - D. erayada qoyska (tusaalayaal ka mida)
 1. Aabbaha
 - a. Israa’iil – Baxniintii 4:22; Sharciga Kunoqoshadiisa 14:1; 39:5
 - b. boqorka – 2 Samuu’eel 7:11-16; Sabuurka 2:7
 - c. tusaalayaasha falalka aabanimo – Sharciga Kunoqoshadiisa 1:31; 8:5; 32:1; Sabuurka 27:10; Maahmaahyadii 3:12; Yeremyaah 3:4,22; 31:20; Hoosheeca 11:1-4; Malaakii 3:17
 2. waalid – Hoosheeca 11:1-4
 3. hooyo – Sabuurka 27-10 (hooyada wax nuujisa); Ishacyaah 49:15; 66:9-13
 4. jacaylka runsheegnimada yar – Hoosheeca 1-3
- II. Sababaha isticmaalka luqada noocan ah
 - A. Waxa lagama maarmaan in Ilaah naftiisa uu aadanaha u muujiyo. Fikirka Ilaah oo lagu tilmaamay labnimana waxa weeyi isagoo ah Ruux!
 - B. Ilaah waxa uu qaataa macnayaasha aadanaha wax usamaynaya isaga oo naftiisa u muujinaya aadanaha leexday (aabbe, hooyo, waalid, jeclaade)
 - C. Iyadoo lagama maarmaan ah, ayaa Ilaah aanu doonin inuu xadido qaab jidh ahaaneed (Baxniintii 20; Sharciga Kunoqoshadiisa 5)
 - D. Muujinta ugu wayni waxay tahay ka dhex muuqashada Ciise! Ilaah waxa uu noqday jidh la taaban karo (1 Yooxanaa 1:1-3). Farriintii Ilaahna waxay noqotay Erayga Ilaah (Yooxanaa 1:1-18).

▣ “intuu” macno ahaan waa “sidaas la ajligeed” (7:46; 11:48; 18:22). Waxaamay sheegaysaa qaanuun aan ahayn caadifad! Ilaah jacaylkiisa ayuu muujiyay (Rooma 5:8) isaga oo bixiyay (aayadda 16) soona diray (aayadda

17, labaduba waa fal dhacay) Wiilkiisa si uu ugu dhinto bedelkooda (Ishacyaah 53; Rooma 3:25; 2 Korintos 5:21; 1 Yooxanaa 2:2).

▣ **“dunida”** Yooxanaa eraygan ah *kosmos* macnayaal kala duwan ayuu u adeegsanayaa (eeg fiirada 1:10 iyo Mawduuca Gaarka ah 13:1).

Sidoo kalena aayaddani waxay beeninaysaa fikiraddi ay Gnostigu aaminsanaayeen. Giriiggu waxay u dabacsanaayeen tayada waxyaabaha la taaban karo ee sharka ah. waxaanay aaminsanaayeen in waxa la taaban karaa yahay xabsiga aadanaha ah ee waxkasta. Haddaba, Yooxanaa kama hadlayo waxa lataaban karo ee sharka amaba jidhka. Ilaah wuxuu jeclaaday dunida (dhulka, Rooma 8:18-22) iyo aadanaha (jidh, Rooma 8:23). Waxa laga yaabay inay middanina laba ujeedo ay yeelan karto sida caanka ku ah qoraallada Yooxanaa (1:5; 3:3, 8).

▣ **“Wiilkiisa keliya oo dhashay”** middan macneheedu waxa weeyi “mid noociisu gaar yahay.” Waa inaan loo fahmin “keliya oo dhashay” fahanka ah (1) dhinaca galmada ama (2) inaanay jirin carruur kale. ujeedadu waa inaanay jirin carruur kale oo ah Ciise oo kale. Fiiro u yeelo 1:14.

▣ **“in mid kastoo isaga rumaystaa”** waa fal jooga oo shaqaynaya, kaasi oo adkaynaya ama xoojinaya rumaysadka ugu horreeya ee isla markaasna soconaya. Eeg Mawduuca Gaarka ah ee 1:14 iyo 2:23. Hadalkana waxa lagaga soo celiyay aayadda 15 iyada oo la xoojinayo aawadeed. Ilaahbaa taasna ku mahadsan. Middanina waxay isu dheelli tiraysaa wixii koox gaar ahi ku talax tagto. Maaha in awoodda Ilaah iyo xorriyadda aadanuhu ay yihiin kuwo isku xidhan! Ilaahna hadiyo goor isaga bilaaba ka jawaab celinta oo dejiya qorshaha (6:44, 65), laakiinse xidhiidhkiisa lala yeelanayo wuxuu ku saleeyay axdiga uu la dhigtay aadanaha. Waa inay ka jawaab celiyaan oo kusii socdaan rumaysadkaas.

MAWDUUC GAAR AH: QADARKA (CALVINISM) IYO DOONISTA AADANAHA (ARMINIANISM)

Tiitos 2:11 wuxuu la simanyahay qoraallada kale ee Axdiga Cusub xagga doorashada. Waxaan u maleeyay inay caawimaad ka gaysan karto tafsiirkayga Rooma 8:29 iyo 9 iyo sidoo kale Efesos 1.

I. Rooma 8:29 – Bawlos wuxuu adeegsanayaa “aqoon” (*proginosko* “ogaansho hore”) labo jeer, waana halkan iyo 11:2. Sida ka muuqata 11:2 waxay tilmaamaysaa axdiga Ilaah ee jacaylka Israa’iil intaanu wakhtigu bilaabmin ka hor. Xasuusno erayga “ogaansho” ee Cibraanigu wuxuu la xidhiidhaa dhawaanshaha xidhiidhka shakhsi ahaaneed, mana aha xaqiiqada ku saabsan qof (Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5). Halkana waxa loogu soo daray iyada oo ay tahay dhacdooyin taxane ah (Rooma 8:29-30). Eraygani wuxuu ahaa mid la xidhiidha qadarka. Si kastaba ha ahaatee, waa in la ogaado in cilmiga Ilaah aanu ahayn waxa asalka u ah doorashada maxaa yeelay haddii taasi ay sidaas tahay, doorashadu waxay noqonaysaa mid lagu saleeyo mustaqbalka aadanaha leexday ka jawaab celintooda, taasi oo noqonaysa wax aadanuhu sameeyaan. Eraygan sidoo kale waxa laga heli karaa Falimaha Rasuullada 26:5; 1 Butros 1:2,20 iyo 2 Butros 3:17.

A. “aqoon” (*proginosko*, “ogaansho hore”)

Ereyadan ah “ogaan” iyo “qadar” labaduba waxay la socdaan meeleyahay “hore” sidaasi darteedna waxa loo tarjumaa “ogaansho hore.” Aayadaha qeexaya qadarka Axdiga Hore dhexdiisa waxa weeyi, Rooma 8:28-30; Efesos 1:13-14; iyo Rooma 9. Aayadahani markaas waxa ay sheegayaan awoodda Ilaah. isaga ayaana wax walba maamula. Waxa jira qorshe Ilaahiya oo hore oo ku shaqaynayay wakhti. Si kastabana ha ahaatee, qorshahni maaha mid ku dhisan doorasho. Waxa lagu saleeyayna maaha awoodda iyo aqoonta Ilaah oo keliyamm laakiinse waxa lagu saleeyay dabecadda Ilaah ee aan is beddelin, naxariista, jacaylka iyo nimcada aan la mutaysanina wadata.

Haddaba, waa inaan ka taxadirmo dhaqankeena reer galbeedka inaga oo isku dayayna inaan xaqiiqadan la yaabka badan midabayn ku samayno. Sidoo kalena waa inaan ka ilaalinno iyada oo lagu kharibayo dhacdooyinka taariikhiga ah, iyo in lagu saleeyo khilaafaadka fiqi ee u dhexeeya Augustine iyo Pelegius ama Kalfanka iyo Armiiniyamka.

B. “qadaray” (*proorizo*, “hore loo ansixiyay”)

Qadarku maaha caqiido xadaynasa jacaylka Ilaah, nimcadiisa iyo naxariistiisa amaba mid aan qofka ka reebaysa injiilka. Waxa loogala jeedaa xoojinta aragtida rumaystayaasha ee ku waajahan dunida. Ilaah aadanaha oo dhan ayuu u ahaaday (1 Timoteyos 2:4; 2 Butros 3:9). Isaga ayaana wax

walba maamulaya. Kuma ama maxaa isaga inaga faquuqi kara (Rooma 8:31-39)? Ilaah taariikhda oodhan wuxuu u arkaa wax jooga; aadanahuna wakhtiga ayay ku hoos jiraan. Awooddeenna caqli ahaaneedna waxa weeyi mid xadidan. Haddaba ma jiro iska hor imaansho ah awoodda Ilaah iyo doonista xorta ah ee aadanuhu, waana qaab ku salaysan axdi. Tanina waa tusaale kale oo muujinaya xaqiiqada. Caqiidooyinka kitaabiga ah dhinacyo kala duwan aya alaga eegaa, waxaanay hadiyo jeer u muuqdaan kuwo is burinaya. Xaqiiqaduna waxay tahay isu dheelli tirka labada waxyaalood ee loo arko inay iska soo horjeedaan. Waa intaynaan ka isku dayin qaadashada xaqiiqooyinkaasi mid kamida, sidoo kalena waa inaynaa kala soocin xaqiiqooyinka kitaabiga ah.

Sidoo kale waxa muhiim ah in muhiimadda doorashada aan laga dhigay janada la helayo marka aan dhimano oo keliya, laakiinse waa lamidnimada Masiixa ee hadda (Rooma 8:29; Efesos 1:4; 2:10). Waxa la inoo doortay inaan ahaano “quduus iyo ceeb la’aan.” Ilaah waxuu doortaa inuu ina beddelo si kuwa kale u arkaan beddelkaas oo kaddib u rumaystaan Masiixa. Qadarkuna maaha faa’iido shakhsi ahaaneed, laakiinse waa masuuliyad axdi ahaaneed. Middanina waa ujeedada Masiixiyadda. Quduusnimaduna waa doonista Ilaah ee ku wajahan rumayste kasta. Doorashada Ilaah waa la midnimada Masiixa (Efesos 1:4), mana aha wax si gaara oo kale loogu taagnaado. Waxa loo baahan yahay ekaanshaha Ilaah ee aadanaha abuurka lagu siiyay (Bilowgii 1:26; 5:1,3; 9:6), in dib loo soo celiyo.

C. “la waafajiyay ekaansha Wiilkiisa” ujeedada Ilaah waxay tahay soo celinta ekaanshihiisa ku lumay leexashada. Rumaystayaashana waxa waxa laga raabaa la midnimada Masiixa (Efesos 1:4).

II. Rooma 9

A. Rooma 9 waxa uu ka mid yahay qoraallada ugu xooggan Axdiga Cusub kuna saabsan awoodda Ilaah (Efesos 1:3-14), halka cutubka tobnaadna uu kaga hadlayo doonista xorta ah ee aadana (“mid kasta” aayadda 4; “ku kasta” aayadaha 11,13; “dhammaan” aayadda 12 [labo jeer]). Bawlos marnaba iskuma dayayo dib isu waafajinta xaqiiqadan fiqi ahaaneed, labadubana waa run! Badanaa caqiidooyinka Kitaabku waxa ay yihiin kuwo looga hadlay iyaga oo iskasoo horjeeda, badanaa nidaamyada fiqiguna caqli gal ahaan badhkood waa run. Augustiinka iyo Kaalfanka oo kasoo horjeeda Peleganiisamka iyo Armiiniyanku waxay koobsanayaan run iyo khaladad labadaba. Caqiidooyinka kitaabkiga ahi waxay yihiin kuwo lagu doorbido waxyaalo kala duwan oo la xidhiidha fasiraadaha.

B. Isla xaqiiqadan (waxa laga helayaa Rooma 9:23) waxa lagu sheegay Rooma 8:29-30 iyo Efesos 1:4,11. Cutubkani waa ka ugu xooggan ee ku saabsan awoodda Ilaah ee Axdiga Cusub dhexiisa. Ma jiro muran ka taagan in Ilaah uu gacanta ku hayo xukunka iyo badbaadada. Xaqiiqada wayna maaha in la iska indho tiro. Si kastaba ha ahaatee, waa in lagu dheelli tiro doorashada Ilaah ee axdiga, oo macneheedu yahay aadanaha la xidhiidha ekaanshihiisa. Waxa hubaala in kuwo ka mida Axdiga Hore axdiyadiisa, sida Bilowgii 15, ay yihiin kuwo shuruud la’aan ah oo aan la xidhiidhin ka jawaab celinta aadanaha, laakiinse axdiyada kale waxa ay shuruud u yihiin ka jawaaba celinta (Beer Ceeden, Nuux, Muuse, Daa’uud). Ilaah wuxuu leeyahay qorshaha uu ku badbaadinayo khalqiga; mana jiro aadane qorshihiiisa saamayn karaa. Ilaah wuxuu doortay inuu shakhsiyaad u ogolaado ka qayb qaadashada qorshihiiisa, jaaniskan ka qayb qaadashaduna arrin fiqi ahaaneed oo u dhaxaysa awoodda (Rooma 9) iyo doonista madaxa bannaan ee aadanaha (Rooma 10).

Ma habboona kala doorasho lagu sameeyo waxyaalaha kitaabku sheegayo. Waxa jiro walaac u dhexeeya caqiidooyinka, maxaa yeelay dadka barigu sida ay u arkaan ayay usoo tebiyaan. Caqiidooyinku haddaba, waa inay ahaadaan kuwo isla yeesha xidhiidh, waayo xaqiiqooyinku way iskabayaan.

III. Efesos 1

A. ADoorashadu waa caqiido cajiib leh. Si kastaba ha ahaatee, maaha kala jeclaysi ama kala doorbidis, laakiinse waa qalab kuwa kale u macnaynaya badbaadada! Axdiga Hore dhexdiisa waxa loogu adeegsaday adeeg; Axdiga Cusub dhexdiisana waxa loogu adeegsaday badbaado soo saaraysa adeeg. Kitaabku marnaba ma waafaqayo aragtida ku saabsan awoodda Ilaah iyo doonista aadanaha oo is khilaafsan, laakiinse labadaba wuu ansixinayaa. Tusaalaha ugu wanaagsan ee kitaabka ku jiraana wuxuu noqon karaa Rooma 9 oo ku saabsan awoodda Ilaah iyo doorashadiisa iyo Rooma 10 oo ku saabsan ka jawaab bixinta lagama maarmaanka ah ee aadanaha (10:11,13).

Furaha arrintan fiqi ahaaneed waxa laga heli karaa 1:4. Ciise waa kan Ilaah doortay isaga ayaana dhammaantood lagu dooran karaa (Karl Barth). Ciise waa ogolaanshaha Ilaah ku oggolaan karo baahida aadana (Karl Barth). Efesos 1:4 ayaa sidoo kale arrintan ka hadlayay isaga oo sheegaya ujeedada qadarku, inaanay ahayn janada oo keliya, laakiinse ay tahay quduusnaanta (la midnimada Masiixa). waxa hadiyo goor ina soo jiita faa'iidada injiilka inaga oo masuuliyaddana iska indha tirna! Yeedhitaanka Ilaah (doorashada) waa wakhti iyo sidoo kale waaritaan!

Caqiidooyinku waxay ku yimaadaan xidhiidhka ay la leeyihiin xaqiiqooyinka kale, mana aha mid keliya ama xaqiiqooyin aan isla xidhiidhin. Sinaanshaha wanaagsani wuxuu noqonayaa koox kasoo horjeeda hal xiddig oo keliya. Ilaah si aan la mid ahayn galbeedka ayuu xaqiiqada ugu muujiya bariga. Waa intaynaan kala kaxaynin xaqiiqooyinka caqiido ahaan iska soo horjeeda (Ilaah oo wax dhaqaajiya iyo isagoo horeba wax u keena; ammaanka iyo dib u hagaajinta; Ciise oo lasiman Aabbaha iyo Ciise oo adeege u ah Aabbaha; xorriyadda Masiixiga iyo masuuliyadda Masiixiyaddu ay kaga tirsantahay axdiga, iwm).

Fikirka fiqi ahaaneed ee “axdi” wuxuu la midaysan yahay awoodda Ilaah (oo hadiyo goor wax bilaaba qorshayaashana dejiya) ay la socoto aqbalitaanka iyo towbad keenka aadanaha xaggiisa ka imanaysaa. Ka taxadir isku caddaynta aayadaha oo iska soo horjeeda! Sidoo kalena ka digtoonow inaad doorbiddo caqiida amaba fiqiga aad umalaynaso inuu kuu saxsan yahay.

- B. “Wuu ina doortay” sida ku sugan Efesos 1:4 waxanaay xoojinaysaa cidda uu falkani kasoo fulayo. Middanina waxay diiradda saaraysaa doorashada Aabbaha ee horeba ahayd. Doorashada Ilaah waa inaan loo fahmin sida Islaamka oo kale, ama sida Kalfanku aayadaha qaar u arkaan, laakiinse waa inay sameeyo macne axdi ahaaneed. Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu badbaadiyo aadanaha leexday (Bilowgii 3:15). Ilaah wuxuu u yeedhay oo doortay Ibraahim si uu aadanaha oo dhan ugu doorto (Bilowgii 12:3; Baxniintii 19:5-6). Ilaah laftiisa ayaa doortay dhammaanba dadka ku socda rumaysadka Masiixa, sidoo kalena ugu horraynba isaga ayaa badbaadada keena (Yooxanaa 6:4, 65). Qoraalka iyo Rooma 9 waxa ay yihiin caqiidada ku salaysan qadarka ee ay qaateen Augustine iyo Calvin.

Ilaah rumaystayaasha umuu dooran oo keliya badbaadada, laakiise sidoo kale wuxuu u doortay quduusnaan (Kolosay 12). Middani waxay la xidhiidhi kartaa (1) meesha aan ka taaganahay Masiixa (2 Korintos 5:21) ama (2) Doonista Ilaah ku rabo inuu dib ugu hagaajiyo dabeecadda carruurtiisa (2:10; Rooma 8:28-29; Galatiya 4:19). Ilaah wuxuu carruurtiisa u rabaa janada maalin maalmaha ka mida iyo la midnimada Masiixa imika.

“isaga dhexdiisa” waxay fure u tahay Efesos 1:4. Barkadaynta Aabbaha, nimcada iyo badbaadadu waxay la socdaan Masiixa (Yooxanaa 14:6). U fiirso qaabka naxwe ahaaneed ee lagusoo celceliyay (meelaynta goobta) ee aayadaha 3 “Masiixa dhexdiisa”; aayadda 4, “isaga dhexdiisa”; aayadda 7, “isaga dhexdiisa”; aayadda 9, “isaga dhexdiisa”; aayadda 10 “Masiixa dhexdiisa” “isaga dhexdiisa”; aayadda 12 “Masiixa dhexdiisa” iyo aayadda 13 “isaga dhexdiisa”(labo jeer). Ciise waa “ogolaanshaha” Ilaah ee aadanaha leexday (Kari Barhc). Ciise waa ninka la doortay ee dhammaana isaga lagu doortay. Dhammaanba barakada Ilaaha Aabbaha ahi waxay ku timaaddaa Masiixa.

Erayada ah “ka hor aasaasitaankii dunida” sidoo kale waxa lagu dhex adeegsaday Matayos 25:34; Yooxanaa 17:24; 1 Butros 1:19-20 iyo Muujintii 13:8. Waxaanay tusinaysaa badbaadada Ilaah Saddexmidnimada ah ee xitaa ka horraysay Bilowgii 1:1. Aadanaha waxa lagu xadiday wakhti; inaga wax waliba waa inoo wax jooga, wax tegay, iyo wax mustaqbal ah, laakiin Ilaah sidaas uma aha.

Ujeedada qadarku waa quduusnaan ee maaha faa'iido. Ilaahna muu dooranin tiro yar oo carruurta Aadan ka mida, laakiinse dhammaan wuu doortay! Waxaana weeyi yeedhitaan ah in ay Ilaah sida oo kale quduus u ahaadaan (1 Tesaloniika 5:23; 2 Tesaloniika 2:13); ekaanshihiisa (Bilowgii 1:26-27). Haddaba, waa ayaan darro in qadarka loo rogo oo laga dhigto arrin fiqi ahaaneed, halkii ay ka ahaan lahayd nolol quduusnaan ah. marwalba fiqiyadeenu waxay aad ugu dhawaaqaan waxaan kitaabka ku sugnayn.

Erayga “ceeb la'aan” (*amomos*) ama “ka xora ceebta” waxa loo adeegsaday (1) Ciise (Cibraaniyada 9:14; 1 Butros 1:19); (2) Sekaryaah iyo Elesabeet (Luukos 1:6); (3) Bawlos (Filiboy 3:6); iyo (4) dhammaanba Masiixiyiinta runta ah (Filiboy 2:15; 1 Tesaloniika 3:13; 5:23). Ilaah

doonista uu la rabo rumaystayaasha oo dhambi maaha janada danbe oo keliya, laakiin waa la midnimada Masiixa ee hadda (Rooma 8:29-30; Galatiya 4:19; 1 Butros 1:2). Rumaystayaasha waa inay dabeecadda Ilaah u muujiyaan dunida luntay iyadoo ujeedaduna tahay wacdin.

Naxwe ahaan erayana “jacaylka dhexdiisa” ee aayaddani wuxuu la mid noqon karaa midkood aayadaha 4 ama 5. Si kastaba ha ahaatee, marka ereyadan lagu dhex adeegsaday meelaha kale ee Efesos, waxay hadiyo jeer sheegaysaa jacaylka aadanuhu u qabaan Ilaah (3:17; 4:2,15,16).

- C. Efesos 1:5 dhexdeeda erayada ah “inoogu doortay” waa fal tegay oo shaqaynaya. Erayada Giriigga ahi waxay ka kooban yihiin “hore” iyo “doortay.” Waxaanay sheegaysaa qorshaha Ilaah ee badbaadada ah isla markaana horeba u qadarnaa (Luukos 22:22; Falimaha Rasuullada 2:23; 4:28; 17:31; Rooma 8:29-30). Qadarku waa xaqiiqo kamida waxyaalaha la xidhiidha badbaadada Aadanaha. Waxaanay qayb ka tahay tusaalayaal dhawra oo ah xaqiiqooyin isla xidhiidha. Ujeedadeenu may ahayn marnaba mid kelideed wax sheegaysa oo taagan, maxaa yeelay xaqiiqooyinka kitaabiga hi waxay yihiin kuwo taxane ah oo wada socda. Madaahibtuna waxay u leexdaan xaqiiqooyinka kitaabiga inay miduun xoojiyaan (qadarka oo kasoo horjeeda xorriyada iyo doonista aadanaha; ammaanka rumaystaha iyo dadaalka qoduusiinta; denbiga asalka ah iyo denbiga qofka ka yimaadda; denbi la’aanta iyo denbi yaraanta; quduus ka dhigista hore iyo qudusnaanta soconaysaa; rumaysad iyo camal; xorriyadda Masiixiyiinta iyo masuuliyadda Masiixiyiinta; ka hormarid iyo bilaabid).

Doorashada Ilaah kuma tiirsana sii Ogaanshaha waxa aadanuhu samaynayaan, laakiinse waxay ku tiirsantahay naxariistiisa dabeecadda u ah (aayadaha 9 iyo 11). Waxa uu rabaa in dhammaan dadku wada badbaadaan (Yexesqeel 18:21-23,32; Yooxanaa 3:16-17; 1 Timoteyos 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; 2 Butros 3:9). Nimcada Ilaah ayaana aayadahan fure u ah (aayadaha 6a, 7c, 9b), sida naxariista Ilaah ay fure ugu tahay aayadaha ka hadlayay qadarka ee Rooma 9-11.

Aadanaha leexday rajadiisa keli ahi waa nimcada iyo naxariista Ilaah (Ishacyaah 53:6 iyo aayado kale oo dhara Axdiga Horena lagaga soo dhex xigta Rooma 3:9-18). Waxa fasiraadda fiqiga cutubyadan hore muhiim u ah, in la rumayso Bawlos oo waxyaalahan gebi ahaantoodaba aan la xidhiidhinayn wax qabadka aadanaha: qadarka (cutubka 1), nimcada (cutubka 2), iyo qorshaha Ilaah ee daa’imiska ah kuna waajahan badbaadada (qarsoodiga, 2:11-3:13). Waxay kuwani isu dheelli tir u yihiin oo saxayaan waxbarista macallimiinta beenta ah ee aadanaha iyo faanka.

▣ **“uusun lumin”** waxay tahay inuu qof lumayo. Lumitaankoodu (*amollumi*, dhicitaanka falkani) wuxuu si toosa ugula xidhiidha rumaysad la’aantooda Ciise (11:25). Ilaah maaha mid ku sababaya ama ku sababi doona rumaysad la’aantooda (Yexesqeel 18:23, 32; 1 Timoteyos 2:4; 2 Butros 3:9).

Kuwo badan ayaa isku dayay in erayadani ay tilmaamayaan baabiinta gebi ahaanba xumaanta. Tani waxay kasoo khilaafaysaa Daanyeel 12:2 iyo Matayos 25:46. Tani waxay tusaale wanaagsan u tahay rumaystayaasha wanaagsan ee qoraallada tusaalaha ah ee Bariga ku xoojinaya Galbeedka ku tiirsan qaabka fasiraadda. Falaqayn wanaagsan ereyadan ku saabsan ka eeg Robert B. Girdlestone kitaabkiisa *Synonyms of the Old Testament* pp. 275-277. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 10:10.

Markale u fiirso sida Yooxanaa uu u qorayo labada waxyaalood ee isla socda (lumis iyo nolosha weligeed ah). Erayada iyo qaabka fiqi ahaaneed ee waxbaristii Ciise waxay aad ugu kala duwantahay injiillada kale iyo Yooxanaa. Waxa lala yaabi karaa xorriyadda ay haysteen qorayaasha injiilku markii ay ku wacdinayeen waxbarista Ciise iyagoo la hadlayay cidda ay wax u qorayeen. Eeg Gordon Fee iyo Douglas Stuart, kitaabkooda *How To Read The Bible For All Its Worth*, pp. 127-148.

3:17 “inuu xukumo dunida” waxa jira aayado badan oo Yooxanaa kamida isla makraasna ka hadlaya in Ciise uu yimid isaga oo ah badbaadiye, isla markaasna aanu u imanin inuu wax xukumo (3:17-21; 8:15; 12:47). Si kastaba ha ahaatee, waxa jira aayado kale oo Yooxanaa ka mida isla markaana sheegaya in Ciise u yimid inuu wax xukumo, ama xukumi doono (5:22-23, 27; 9:39; iyo sidoo kale qaybaha kale ee Axdiga Cusub, Falimaha Rasuullada 10:42; 17:31; 2 Timoteyos 4:1; 1 Butros 4:5).

Faallooyin fiqi ahaaneed oo dhawra ayaa ah isagoo

1. Ilaah Ciise wuxuu siiyay xukunka isaga oo addeecayana badbaadadu keenay (5:23)
2. Ciise markii hore uma iman inuu wax xukumo, laakiin wuxuu u yimid inuu badbaado keeno (3:17), laakiin xaqiiqadii dadkaas diiday iyaga ayaa is xukuma
3. Ciise waxa uu soo laaban doonaa isaga oo ah boqor waxna xukumaya (9:39)

3:18 aayaddani waxay kusoo celinaysaa ujeedada ah badbaadada lagu helayo Masiixa iyo xukunka shakhsi ahaaneed. Ilaah dadka uma diro cadaabta, laakiinse iyaga ayaa isu dira. Rumaysadkuna wuxuu leeyahay natiijooyin sii soconaya (“rumaysnaan” fal jooga oo shayanaya) iyadoo kii aan rumaysadka lahayna (“la xukumay,” fal abyaan oo dhacay iyo “inaanu rumaysan” fal abyan oo shaqaynaya). Eeg Mawduucyada Gaarka ah ee 2:23 iyo 9:7.

3:19-21 “dadkiise waxay nuurkii ka jeclaadeen gudcurka” dad badan oo injiilka maqlay way iska diideen, umaney diidin sababo caqligal ah amaba dhaqan ahaan ah, laakiinse ugu horrayn waa waxa ay naftoodu jeceshahay (Ayuub 24:13). Iftiinka ama nuurku waa Masiixa (1:9; 8:12; 9:5; 12:46) iyo farriintiisa ah jacaylka Ilaah, baahida aadanaha, shaqada Masiixa, iyo ka jawaab celinta loo baahan yahay. Tanina waa ujeedada soo laalaabasay 1:1-18.

3:19 “Kanu waa xukunka,” xukunku sida badbaadaba oo kale, labaduba waa xaqiiqo joogta (3:19; 9:39) waana mustaqbal (5:27-29; 12:31, 48). Rumaystayaashu waxay ku noolyihiin wixii hore u yimid ilaa haddana aan ahayn. nolosha Masiixinumaduna waxay isugu jirtaa farxad iyo dhibaato; waa guul ka danbaysa dhibaatooyin badan; damaanad qaad laakiinse dadaal uu la socdo!

3:21 “runta falaa” maadaama oo “nuurku” (aayadaha 19, 20 [labo jeer], 21) ay u tilmaamayaan Ciise, waxa suurto gal ah in “runtu”iyana waa in xarafka hore far wayn laga dhigo. Robert Hanna *A Grammatical Aid to the Greek New Testament* wuxuu kusoo xiganayaa N. Turner kitaabkiisa *Grammatical Insights into the New Testament*, kaasoo u tarjama “ninka xer u noqda Runta” (p. 144).

Fiqi ahaan aayaddani waxay sheegaysaa xaqiiqada ku sugan Matayos 7. Nolosha weligeed ahi waxay leedahay dabeecad loo fiirsan karo. Qofka aan si runa Ilaah ugula kulmin Masiixu, ma noqonayo mid uu ka buuxsano Ruuxa Quduuska ahi, sidiisaas ayaanu ahaanayaa. Masaalka carradu wuxuu diiradda saarayaa midho dhalitaanka mana aha koritaanka (Matayos 13; Markos 4; Luukos 8. Sidoo kale u fiirso hadalka Yooxanaa ee 15:1-11). Shaqada laguma helo badbaado, laakiinse waxay calaamad u yihiin badbaadada (Efesos 2:8-9, 10).

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu yahay macnaha cibaarada “markale dhalan”?
2. Maxaad u malaynasaa in “biyaha” aayadda 5 ay sheegayaan sababtuna waa maxay?
3. Muxuu “rumaysad” (rumayska badbaadadu) koobsanayaa?
4. Yooxanaa 3:16 ma waxay ku saabsantahay jacaylka Ciise ee aadanaha mise jacaylka Aabbaha?
5. Sidee Kalfaniisamku ula xidhiidhaa Yooxanaa 3:16?
6. “lumis” ma waxa loogala jeedaa baabi’itaan dhammays tiran?
7. Qeex “nuuka.”

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAH 22-36

- A. Yooxanaa xoojintiisa uu xoojinayo Ilaahnimada Ciise ee dhammayska tirani waxay isku xidhaysa bilowga Injiilka iyo shakhsiyaadka gaarka ah ee uu wada hadalka la yeelanayay. Cutubkanina qaabkaas ayuu kusii socdaa.
- B. Yooxanaa injiilkiisa wuxuu qoray ku dhowaad dhammaadkii qarnigii kowaad, waxaanu la tacaalayaa su’aalo yimid kaddib markii injiillada kale la qoray. Waxa kamida fikiradii dadka qaar ka aaminsanaayeen Yooxanaa Baabtiisa (Falimaha Rasuullada 18:24-19:7). Waxay waxa muhiim in sida ku sugan 1:6-8, 19-36 iyo 3:22-36 Yooxanaa Baabtiisuhu uu uu toosinayo xidhiidhka u dhexeeya isaga iyo Ciisaha Naasereet, iyo isaga oo tusinaya doorka ah inuu Ciise yahay Masiixa.

NASB (UPDATED) TEXT: 3:22-24

²²Waxaas dabadeed Ciise iyo xertiisii waxay yimaadeen dalka Yahuudiya, oo meeshaas ayuu iyaga la joogay oo dad ku baabtiisay. ²³Yooxanaana wuxuu dad ku baabtiisayay Caynoon oo ku dhow Saalim, waayo, meeshaasu waxay lahayd biyo badan, iyaguna way yimaadeen, waana la baabtiisay. ²⁴Waayo, Yooxanaa weli xabsiga laguma tuurin.

3:22 “waxay yimaadeen dalka Yahuudiya,” shaqadan hore ee Galiili iyo Yahuudiya lagagama hadlin injiillada kale. injiilladu maaha taariikh qoraayaashii Masiixa. Eeg Gordon Fee iyo Douglas Stuart, kitaabkooda *How to Read the Bible For All Its Worth*, pp. 127-148.

☐ **“oo meeshaas ayuu iyaga la joogay”** Ciise dadka wuu wacdiyay, laakiinse in badan ayuu xertiisa la sheekaystay. Iyaga ayaanu raacay. Arrintan waxa si fiican uga hadlayay labada kitaab ee Robert E. Coleman, *The Master Plan of Evangelism* iyo *The Master Plan of Discipleship*, labadubana waxay ka hadlayaan Ciise shakhsi ahaatiisa oo uu uga mid ahaa koox yar!

☐ **“oo dad ku baabtiisay.”** Cutubka 4:2 waxa aan ka baranaynaa in Ciise laf ahaantiisu aanu waxba baabtiisin, laakiinse xertiisii ayaa samaysay. Ciise farriintiisu waxay ugu horrayntii aad uula mid ahayd farriintii Yooxanaa Baabtiisaha. Waxay ahayd farriinta Axdiiga Hore ee towbad keenka iyo diyaar garawga. Haddaba, baabtiiska halkan lagu sheegay maaha kan Masiixiyiinta, laakiinse wuxuu calaamad u yahay towbadkeenka iyo aqbalitaanka ruuxiga ah.

3:23 “Yooxanaana wuxuu dad ku baabtiisayay Caynoon oo ku dhow Saalim” goobta ay halkani ku taalla waa midaan la hubin

1. Qaar waxay rumaysan yihiin inay ahayd Periya oo kudhow Urdun
2. Qaar waxay rumaysan yihiin inay ku taallay woqooyi bariga Samaariya
3. Qaar waxay rumaysan yihiin inay saddex mayl dhinaca bari ka xigto Shechem

Maadaama oo “*aenon*” u muuqato in macneheedu yahay “biyo mareen” waxa ugu haboon #3. Goobtu meesha ay doontaba ha ahaato ee, Ciise wuxuu ka adeegaysay Yahuudiya iyadoo Yooxanaana uu ka joogay meel dhinaca waqooyi ka xigta oon ka fogayn.

3:24 “Waayo, Yooxanaa weli xabsiga laguma tuurin.” Lama hubo odhaahdan taariikh ahaaneed sababta meeshan loogu soo daray. Qaar waxay yidhaahdaan waa isku day ah waafajinta taariikh ahaaneed ee Injiillada kale (Matayos 14:1-12; Markos 6:14-29). Waxay u shaqaynasaa iyada oo macnaynasa taariikhda kulankan ku sugan nolsha Masiixa.

NASB (UPDATED) TEXT: 3:25-30

²⁵Sidaa aawadeed waxaa ka dhex kacay Yooxanaa xertiisii iyo nin Yuhuudi ahaa weydiis oo daahirinta ku saabsan. ²⁶Markaasay u yimaadeen Yooxanaa oo ku yidhaahdeen, Macallimow, kii kula jiray Webi Urdun shishadiisa oo aad marag u furtay ayaa dad baabtiisaya, oo dadka oo dhan way u imanayaan. ²⁷Yooxanaa waa u jawaabay oo ku yidhi, Ninna waxba ma heli karo haddaan jannada laga siin. ²⁸Idinka qudhiinnu markhaatiyaal baad tihiin inaan idhi, Anigu ma ihi Masiixa, laakiin hortiiisa ayaa lay soo diray. ²⁹Kii aroosadda qabaa waa arooska, laakiin saaxiibka arooska oo ag taagan oo maqla isaga, aad buu ugu farxaa codkii arooska daraaddiis. Sidaa aawadeed farxaddaydu waa dhan tahay. ³⁰Isagu waa inuu kordho, aniguse waa inaan varaado.

3:25 “waxaa ka dhex kacay Yooxanaa xertiisii iyo nin Yuhuudi ahaa weydiis” “waydiis” (NASB, NRSV, NJB) waa hadal xooggan oo ah “muran.” Kuwo ka mida qoraal gacmeedyada Giriigga ayaa qoraya jamac ka dhigaya “Yuhuud.” Qoraal gacmeedyadii hore ee Giriigga si isleeg ayaa loo qaybiyay, maxaa yeelay kelidu badanaa caadi maaha (MSS P²⁵, a², A, B, L, W), waana asal. UBS⁴ ku wuxuu ku sheegaya “B” isagoo ka

dhigaya (hubaal). Culimadii horena waxay la socon jireen qoraalka. Waxa sidoo kale iyana xiiso leh Yooxanaa xertiisa oo bilaabay murankan.



NASB, NKJV, NRSV, NJB “daahirinta ku saabsan.”

TEV “arrinta khusaysa daahirinta”

Waxa jiray aragtiyo dhowra oo ku saabsanaa ujeedada murankan (NKJV)

1. Waxa suurto gal ah in xerta Yooxanaa ay ka hadlayeen xidhiidhka u dhexeeya baabtiisa Yooxanaa iyo Ciise iyo siday ula xidhiidhaan daahirinta dhaqan aahaaneed ee Yuhuudda; ereyadan kuwo la mida waxa lagu adeegsaday 2:6.
2. Qaar waxay rumaysan yihiin inay tusinayso macnaha Ciise oo baraya in noloshiisa iyo shaqadiisu buuxiyeen ballan qaadyadii
 - a. 2:1-12, xafladdii arooska Kaana
 - b. 2:13-22, daahirintii macbadka
 - c. 3:1-21, la sheekaysigii Nikodemoskii ahaa taliyaha Yuhuudda
 - d. 3:22-36, daahirinta Yuhuudda iyo baabtiiska Yooxanaa Baabtiisaha iyo Ciise.

Xaqiiqada aanu macnuhu si gaara ugu adkaynayn doodan ayaa ka tarjumaysa, xaqiiqada ahayd jaaniska labaad ee Yooxanaa Baabtiisuhu ugu markhaati furayay Ciise Nasereet.

3:26 “oo aad marag u furtay ayaa dad baabtiisaya, oo dadka oo dhan way u imanayaan” xertu waxay xusuusteen markhaati furkii hore ee Yooxanaa ee ku saabsanaa Wanka Ilaah (1:19-36), waxaanay wax ka arkeen guulaysashada Ciise. Sidoo kale Ciise wuxuu xaasaasi ka ahaa wax kasta oo ku saabsan tartan (4:1).

3:27 “Ninna waxba ma heli karo haddaan jannada laga siin” waa hadal toosan oon lahayn wax madmadow ah, mana jiro tartan ka dhexeeya waxyaalaha ruuxiga ah. wax kasta oo rumaystayaashu haystaanna waxa lagu siiyay nimcada Ilaah. Si kastaba ha ahaatee, waxa jiray hadal badan oo ku saabsan “iyada” iyo “isaga.”

1. Qaar waxay yidhaahdaan “isaga” waxay sheegaysaa rumaystaha halka “iyada” ay ka tahay badbaadada ku imanaysa Masiixa (Ilaah ayaa bilaaba, aadanahuna way ka jawaab celiyaan oo keliya, Yooxanaa 6:44, 65)
2. Kuwo kalena waxay rumaysan yihiin in “isaga” ay sheegayso Ciise halka “iyada” ay ka sheegayso rumaystayaasha (Yooxanaa 6:39; 10:29; 17:2, 9, 11, 24)

Farqiga labadan u dhexeeya ayaa wuxuu yahay “siin” oo sheegaysa mid ahaan badbaadada rumaystaha kelida ah, amaba ta dhamaanba rumaystayaasha hadiyad ahaanta xagga Ilaah loogaga siiyo iyadoo Ciise soo maraysa (17:2).

3:28 “Anigu ma ihi Masiixa” Yooxanaa Baabtiisuhu si gaara ayuu usheegayaa, sidii horeba uu ugu sheegay 1:20, inaanu ahayn Masiixa, laakiinse uu hordhac u yahay. Waa hadal maldahan oo ku saabsan waxsii sheegistii Malaakii 3:1; 4:5-6, oo ay la socoto Ishacyaah 40 (Yooxanaa 1:23). Eeg fiirada gaarka ah ee “Masiix” 1:41.

3:29 “Kii aroosadda qabaa waa arooska” waxa jira tusaalayaal badan oo ka mida Axdiga Hore isla markaasna tusaale ahaan sida guurka oo kale ugu tilmaamaya xidhiidhka ka dhexeeya Ilaah iyo Israa’iil (Ishacyaah 54:5; 62:4, 5; Yeremyaah 2:2; 3:20; Yexesqeel 16:8; 23:4; Hoosheeca 2:21). Bawlos ayaa sidoo kale ku adeegsanaya Efesos 5:22ff. guurka Masiixiyiinta ayaa laga yaabaa inuu yahay tusaalaha ugu wanaagsan ee xidhiidhk axdiga.

▣ **“Sidaa aawadeed farxaddaydu waa dhan tahay.”** magaca ah “farxad” iyo falka “farxis” saddex jeer ayaa aayaddan dhexdeeda lagu adeegsaday. Halkii uu ka yeelan lahaa ruux tartan ah ayaa Yooxanaa Baabtiisuhu waxa uu si cad u sheegayaa sida uu ugu faraxsan yahay Ciise.

3:30 “Isagu waa inuu kordho, aniguse waa inaan varaado.” Erayga ah “waa inuu” (*dei*) halkan waa ku muhiim. Waxa hore loogu isticmaalay 3:14 iyo 4:4, waana sheegitaan xooggan oo Yooxanaa uu ku sheegayo heerka uu ka taagan yahay kan isaga ka muhiimsan oo ah Ciise.

NASB (UPDATED) TEXT: 3:31-36

³¹Kii xagga sare ka yimaadaa, dhammaan ayuu ka sarreeyaa; kii dunida ka yimaadaana waa kii dunida, oo wuxuu ka hadlaa dunida. Kii jannada ka yimaadaa, dhammaan ayuu ka sarreeyaa. ³²Wuxuu arkay oo maqlay waxaas ayuu ka marag furaa, ninnana maraggiisa ma aqbalo. ³³Kii maraggiisa aqbalay wuxuu xaqiijiyey in Ilaah run yahay. ³⁴Waayo, kii Ilaah soo diray ayaa hadalkii Ilaah ku hadla, maxaa yeelay, isagu qiyaas kuma siiyo Ruuxa. ³⁵Aabbuhu wuu jecel yahay Wiilka, oo wax walba ayuu gacanta u geliyey. ³⁶Kii Wiilka rumaystaa, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, kii aan Wiilka rumaysanse, nolosha ma arki doono, laakiin cadhadii Ilaah ayaa ku taal isaga.

3:31-36 waxa jiray dood badan oo mufasiriinta kaga dhex aalooosnayd haddii inay aayadahani noqon karaan

1. Yooxanaa Baabtiisaha oo sii waday baraarujintiisa
2. Erayadii Ciise (3:11-12)
3. Kuwii Rasuul Yooxanaa

Aayadahani waxay u noqonayaan muhiimadda aayadaha 16-21.

3:31 “Kii xagga sare ka yimaadaa” waxa muhiim ah labada magac ee loo adeegsadey Masiixu inay xoojinayaan jiritaankiisii hore iyo Ilaahnimadiisa dhammayska tiran (laga fasiraan karo aayadda 31), iyo imaatinkiisa iyo adeegga Ilaah siiyay (ka muuqanaysa aayadda 34). Erayada ah “xagga sare” waxay la mid yihiin kuwa lagu adeegsaday “markale ka dhalan” ama “ka dhalan xagga sare” ee aayadda 3.

Arrinta ah Ilaah oo kor iyo hoosba maamulaya iyo aadanaha oo dhulka ka taliya, ka hadalkeedu waxa ay dabeecad u tahay Yooxanaa. Waxay ay ka duwan tahay sida ay sheegayaan qoraallada laga helay Badda Dhimatay. Sidoo kalena waxay ka duwantahay fikirki Gonostigu ka haysteen ruuxa iyo waxa la taaban karo. Yooxanaa markaas waxa uu sheegayaa in abuurka laftiisa iyo jidhka aadanuhu aanay laf ahaantooda shar u ahayn.

▣ **“dhammaan ayuu ka sarreeyaa.. dhammaan ayuu ka sarreeyaa”** qaybta hore ee aayaddani waxay ka hadlaysaa ilaahnimada iyo jiritaanka hore ee Ciise, isaga oo ka yimid samada (1:1-18; 3:11-12). Qaybta labaad ee aayadduna waxay sheegaysaa inuu isagu ka sarreeyo khalqiga kale oo dhan. Lama hubo inuu erayga Giriigga ah ee “dhammaan” uu yahay lab amaba dhexdhexaad, isaga oo tilmaamaya dhammaan dadka iyo waxkasta. Marka labaad “ka sarreeya” qoraallada Giriigga kuwo ka mida kuma jirto. UBS⁴ ku go’aan kama gaadhayo kusoo daritaankeeda, laakiinse wuxuu shaki ayaa ku jira (eeg Lifaafa Labaad) iyadoo dhaleecaynta lagu darayo.

▣

NASB “kii dunida ka yimaadaana waa kii dunida, oo wuxuu ka hadlaa dunida”
NKJV “kii dunida ka yimaadaa wuxuu ka yimaaddaa dunida, oo wuxuu ka hadlaa duni”
NRSV “ka dhulka ka yimaaddaa dhulkuu u ahaaday, waxaanu ka hadlaa dhulka”
TEV “ka dhulka ka ahaaday wuxuu ka hadlaa wax ku saabsan dhulka”
NJB “ka dhulka u ahaaday wuxuu u hadlaa sida dhulka looga hadlo”

Tani maaha hadal diidmo ah oo ka soo yeedhaya Yooxanaa. Ereyga duni ee halkani (ge 12:32; 17:4; 1 Yooxanaa 5:8, laakiin 76 jeer Muujintii dhexdeeda) lama mid aha erayga “adduun” (*kosmos*), oo hadiyo goor diidmo ahaan uu Yooxanaa u adeegsaday. Waxa ay middanina tusinaysaa in Ciise uu ka hadlay waxa uu ogyahay ee samada, halka aadanaha oo dhammi ay kaga hadlaan waxa ay ka ogyihiin dhulka. Haddaba, markhaati furka ciise waxa uu yahay mid gebi ahaanba ka wayn mid kasta oo nebi ama wacdiye ah oo dhulka ka socda (Cibraaniyada 1:1-4).

3:32 “Wuxuu arkay oo maqlay waxaas ayuu ka marag furaa,” waxa jira falalka oo aayaddan dhexdeeda ugu kala shaqaynaya: (1) “arkay” fal abyan; (2) “maqlay” fal tegay; iyo (2) “marag furaa” fal taagan. Ciise waa is muujinta buuxda ee Ilaah (1 Korintos 8:6; Kolosay 1:13-20; Cibraaniyada 1:2-3). Waxa uu ku hadlayaa (1) khibraddii shakhsi ahaaneed ee la leeyahay Aabbaha iyo (2) Ilaahnimadiisa.

▣ **“ninnana maraggiisa ma aqbalo.”** Tani hadal dhinaca kale noqonaya maxaa yeelay aayadaha 23-26 waxa ay sheegayaan inay kuwo badani isaga u imanayeen. Erayadani haddaba waxay isku soo duuduubayaan Yuhuudda (3:11), ee maaha macnaha oo keliya.

3:33 “kii” tani waxay tusinaysaa jacaylka aan xadka lahayn ee Ilaah u qabo aadanaha oo dhan. Injiilka Ilaah waa midaan u lahayn wax hor istaaga; ka toobad keena ee rumaysa (Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 20:21), laakiinse albaabku dhammaan wuu u furan yahay (1:12; 3; 16-18; Yexesqeel 18:23, 32; Yooxanaa 3:16; 4:42; 1 Timoteyos 2:4; Tiitos 2:11; 2 Butros 3:9; 1 Yooxanaa 2:1; 4:14).

▣ **“maraggiisa aqbalay”** aayadda 33 waa fal tegay, halka aayadda 36 ay ka tahay fal taagan. Middanina waxay tusinaysaa isku hallaynta badbaadada Ilaah inaanay ahayn oo keliya go’aanka ugu horreeya, laakiinse waa mid lagu noolaado. Isla arrintan ku saabsan aqbalitaanka waxa hore loogu soo sheegay aayadaha 1:12 iyo 3:16-18. Fiiro u yeelo farqiga u dhexeeya aqbalista iyo marag furista (aayadda 33) iyo kusii socoshada aqbalitaanka (aayadda 36). Erayga “aqablis” sida erayga “rumays” waxay Axdiga Cusub dhexdiisa ku leedahay labo macne

1. In si shakhsi ahaana loo aqbalo Masiixa oo laguna socdo
2. Aqbalitaanka xaqiiqooyinka iyo caqiidooyinka uu koobsanayo Injiilku (Yuudas 3, 20)

▣

NASB “wuxuu xaqiijiyey in Ilaah run yahay”
NKJV, NRSV “wuxuu caddeeyay in Ilaah run yahay”
TEV “wuxuu ansixiyay in middanu tahay runta Ilaah”
NJB “waxay tusinaysaa in Ilaah run yahay”

Marka Masiixiyiintu isku halleeyaan Masiixa, waxa ay caddaynayaan farriinta Ilaah ee ku saabsan isaga shakhsiyadiisa, dunida, aadanaha, iyo Wiilkiisuba inay yihiin run (Rooma 3:4). Middani waa ujeedada Yooxanaa (3:33; 7:28; 8:26; 17:3; 1 Yooxanaa 5:20). Ciise waa run maxaa yeelay waxa uu muujinayaa Ilaaha runta ah (3:7, 14; 19:11).

Falka ah “shaabad” ama calaamad waxaad ka eegtaa Mawduucan Gaarka ah:

MAWDUUC GAAR AH: SHAABAD

Shaabbadu waxay ahayd siyaabo wakhtigii hore lagu tusin jiray

1. Runta (Yooxanaa 3:33)
2. Lahaansho (Yooxanaa 6:27; 2 Timoteyos 2:19; Muujintii 7:2-3)
3. Badbaado “Bilowgii 4:15, Matayos 27:6-6. Rooma 15:28 2Korintos 1:22 Efesos 1:13, 4:30”
4. Waxa kale oo ay noqon kartaa shaamabada run ahaanshaha Yahwe hadyadii balan qaadka (Rooma 4:11 iyo 1Korintos 9:2).

Ujeedada shaamabu waxa ay ahayd in lagu aqoonsado Yahwe dadkiisa sidaas daraadeed halaaga iyo masiibooyinku kuma dhaci doonaan dadkiisa. Shaabada shaydaanku waxa ay cadaynaysaa mid lagu aqoonsanayaayo dadkiisa kuwaas oo ah kuwa loogu talo galay halaaga Ilaah muujinta dhexdeeda. “Masiibo” *“I.e..thlipsis”* badiyaaba kuwa aan rumaysadka lahayn waxa ay cadaadiyaan kuwa rumaysadka rumaysadka leh, masiibo-Cadho (*I.e org or thumos*) iyo xukunka Ilaah oo ka dhan noqda kuwa aan rumaysadka lahayn si ay u toobadkeenaan uguna laabtaan si ay ugu badbaadiyaha Ciise. Ujeedada dhinaca haboon ee xukunka dhinaca wanaagsan ee qorshaha xukunka waxa loo arki karaa habaar axdiyeed-barako. Sharciga Kunoqoshadiisa 27:28.

Odhaahda “Ilaaha nool” waa eray ciwaankiisu yahay YWH “Baxniintii 3:14 Sabuurka 42:2; 84:2 Matayos 16:16” is la eray ciwaaneedkan ayaa badanaa waxaa laga heli karaa dhaaraha Kitaabka Quduuska “Sida Sayidku u nool yahay”

3:34 “kii Ilaah soo diray ayaa hadalkii Ilaah ku hadla” waxa jira labo odhaahood oo isku mida aayadda 34 dhexdeeda kuwaasi oo tusinaya in Ciise awooddiisu ay ka ahaatay xagga Ilaah

1. Ilaahbaa isaga soo diray
2. Waxaa ka buuxa Ruuxa

▣ **“isagu qiyaas kuma siiyo Ruuxa.”** Waxa jira labo siyaabood oo loo kala fahmi karo buuxitaanka Ruuxa: qaar waxay rumaysan yihiin:

1. In Ciise uu siiyo rumaystayaasha ka buuxiyo Ruuxa (4:10-14; 7:37-39)
2. In ka buuxitaanka Ruuxu uu sheegayo hadiyadda Ilaah siiyay Masiixa (aayadda 35)

Rabaaniyiinta ayaa erayga “qiyaas” u adeegsan jiray sida Ilaah nebiyada ugu waxyoodo. Waxa kale oo ay intaas raaciyeen inaan nebina aanu helin Ruuxa dhammaysta tiran. Haddaba, Ciise wuxuu ka sarreeyaa nebiyada oo dhan (Cibraaniyada 1:1-2) waana muujinta Ilaah ee dhammayska tiran.

3:35 “Aabbuhu wuu jecel yahay Wiilka” waxa middan marlabaad lagu sheegayaa 5:20 iyo 17:23-26. Xidhiidhka rumaystayaashu la leeyihiin Ilaah waxa lagu aasaasay jacaylkiisa uu ku jecelyahay Masiixa (wiilka gaarka ah, Cibraaniyada 1:2; 3:5-6; 5:8; 7:28). Fiiro u yeelo sababaha uu koobsanayo macnaha ah sababta Ciise loogu rumaysanayo inuu yahay Masiixa.

1. Maxaa yeelay wuxuu ka yimid xagga sare oo dadkana wuu ka wada sarreeyaa (aayadda 31)
2. Maxaa yeelay Ilaah wuxuu usoo diray inuu keeno badbaadada (aayadda 34)
3. Maxaa yeelay Ilaah wuxuu ka buuxiyay Ruuxa (aayadda 34)
4. Maxaa yeelay Ilaah wuu jecelyahay isaga (aayadda 35)
5. Maxaa yeelay Ilaah wax walba isagu gacanta u geliyay (aayadda 35)

Waxa jira erayo badan oo “jacayl” ka loogu adeegsado xidhiidhyada aadanaha. *Agapao* iyo *phileo* waxa adeegsaday Yuhuudda, labadabana waxa loo adeegsaday iyadoo la sheegayo Aabbuhu jacaylka uu Wiilka u qabo.

1. 3:35; 17:23, 24, 26 – *agapao*
2. 5:20 – *phileo*

Waxa laga yaabaa inuu jiro farqi u dhexeeya marka Ciise uu la hadlayay Butros 21:15-17. Marwalabana xasuusno macnaha aayaddu samaynaso oon ahayn midka qaamuusyada.

▣ **“oo wax walba ayuu gacanta u geliyey.”** Waa fal ebyan oo shaqaynaya. Waa erayo Cibraani ah oo tusinaya awoodda (10:28; 13:3; Falimaha Rasuullada 4:28; 13:11). Waa erayo aad u xiiso badan oo kuwo badan oo lamid ahna leh (Yooxanaa 13:3; 17:2; Matayos 11:27; 28:18; Efesos 1:20-22; Kolosay 2:10; 1 Butros 3:22).

3:36

NASB	“Kii Wiilka rumaystaa, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, kii aan Wiilka rumaysanse, nolosha ma arki doono”
NKJV	“kii Wiilka rumaystaa wuxuu leeyahay nolol daa’im ah, kii aan rumaysanina nolol ma arki doono”
NRSV	“ku kasta oo Wiilka rumaystaa wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah; ku kasta oo aan addeecina nolol ma arki doono”
TEV	“ku kasta oo Wiilka isku halleeyaa wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah; ku kasta oo diida Wiilkuna ma noolaan doono”
NJB	“midkasta oo Wiilka isku halleeyaa wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, laakiin ku kasta oo diida inuu rumaysto Wiilku, weligiis ma noolaan doono”

Falalkan dhammaantood taagani waxay ka hadlayaan fal soconaya. Rumaysashadu waxay ka badan tahay hal mar oo keliya mana aha caadifad oo keliya (Matayos 13:20). Tani waxay sheegaysaa haddii qof aanu aqoonsanayn Ciise, inaanu Aabbahana aqoonsan karin (Yooxanaa 12:44-50 iyo 1 Yooxanaa 5:10). Badbaadadu waxay ku timaaddaa xidhiidh socda oo lala yeesho Ciise oo ah Wiilka (10:1-18; 14:6).

Falka jooga waxa uu ka hadlayaa oo keliya ficil waaraya oo soconaya, laakiin ah xaqiiqada joogta ee rumaysadka. Waa wax ay rumaystayaashu imika haystaan, laakiinse aan weli dhammays tirmin. Waxa ay isugu jirtaa “hore” iyo “weli” da labada casri (eeg Mawduuca Gaarka ah ee 1 Yooxanaa 2:17). Eeg Mawduuca Gaarka ah: 9:7.

Waxa kaloo xiiso leh in la ogaado farqiga u dhexeeya “rumays” iyo “adeec” sida aayaddan ku jirta. Injiilku maaha qof ama xaqiiqo aan aqbalno oo keliya, laakiin waa nolol aan ku noolaanayno (Luukos 6:46; Efesos 2:8-10).

▣ **“laakiin cadhadii Ilaah ayaa ku taal isaga.”** Halkan waa meesha keliya ee qoraallada Yooxanaa (marka laga reebo 5 jeer Muujintii) ay ka muuqanayso erayga “cadho” (*orge*). Fikirkan waxa uu guud ahaan la xidhiidhaa “xukun” waana fal jooga oo shaqaynaya. “rumays” “adeec” iyo “cadho” waa xaqiiqooyin jooga oo soconaya mustaqbalkana la dhammays tiri doono. Waxaanay la mid tahay xaqiiqada u dhaxaysa “hore” iyo “weli” ee Boqortooyada Ilaah. Wixii ku saabsan cadhada Ilaah ee kitaabiga ah ka akhri rooma 1:18-3:20.

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sidee fariintii hore ee Ciise uugula mid ahayd tii Yooxanaa Baabtiisaha?
2. Baabtiiskani ma wuxuu la mid yahay baabtiisa Masiixiyadda?
3. Maxaa hadallada Yooxanaa Baabtiisaha aad loogaga hadlayaa cutubyada hore ee Yooxanaa?
4. Qeex tirada iyo noocyada ah farqiga u dhexeeya Ciise iyo Yooxanaa Baabtiisaha isla markaana Yooxanaa uu qorayo?
5. Sidee eragay “aqbal” ee aayadda 33 uu ula xidhiidhaa erayga “rumays” ee aayadda 36? Sidee erayga “adeecis darro” ee aayadda 36 ula xidhiidhaa dooddan?
6. Diiwaan geli sababaha ay tahay in dadku isugu halleeyaan Ciisaha Naasereet oo ah rajada keliya ee badbaadada? (aayadaha 31-36)
7. Sharaxaad ka bixi sababta erayga “cadho” ee aayadda 36 utahay fal taagan.

YOOXANAA 4

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ciise iyo naagtii reer Samaariya	Naagtii Samaariya oo la kulantay Masiixa	Ciise iyo Samaariyadii	Ciise iyo Samaariyaddii	Ciise oo dhex jooga Samaariya
4:1-6	4:1-26	4:1-6	4:1-4	4:1-10
4:7-15			4:5-6	
4:16-26		4:7-15	4:7-8	
			4:9	
4:27-30			4:10	
4:31-38			4:11-12	4:11-14
			4:13-14	
4:39-42			4:15	4:15-24
Bogsiintii wiilka sirkaalka		4:16-26	4:16	
4:43-45			4:17a	
			4:17b-18	
			4:19-20	
4:46-54			4:21-24	
			4:25	4:25-26
	Miro gurashadii la cadeeyay		4:26	
	4:27-38	4:27-30	4:27	4:27-30
			4:28-30	
		4:31-38	4:31	4:31-38
			4:32	
			4:33	
	Badbaadiyaha dunida		4:34-38	
4:39-42		4:39-42	4:39-40	4:39-42
			4:41-42	
	Soo dhowayntii Galiili	Ciise iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn	Ciise oo bogsiiyay wiilkii taliyaha	Ciise oo jooga Galiili
4:43-45		4:43-45	4:43-45	4:43-45
	Sirkaalka wiilkiisii waa la bogsiiyay	4:46-54	4:46-48	Dawayntii wiilka sirkaalka
4:46-54			4:49	4:46-53
			4:50-51	
			4:52-53	
			4:54	

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-54

- A. Waxa jirta ujeedo ku dhex jirta cutubyada 3 iyo 4
1. Hogaamiyihii diinta (Nikodemos) iyo Haweenay bannaanka ah (naagtii ceelka joogtay)
 2. Yerusaleem xaruntii Yuhuudda (xagjirka ah) iyo Yuhuuddii Samaariyaanka (aan xagjirka ahayn)
- B. Xaqiiqada shakhsiyada iyo shaqada Ciise waxa aad loogaga hadlay
1. Wada hadalkii uu la yeeshay naagtii ceelka joogtay (aayadaha 1-26);
 2. Wada hadalkii uu la yeeshay xertiisa (aayadaha 27-38);
 3. Markhaatiyadii dadkii degaanka ahaa (aayadaha 39-42);
 4. Soo dhowayntii dadkii reer Galiiliya (aayadaha 43-45);
 5. Mucjisadii Ciise ku sameeyay bukaanka (aayadaha 46-54).

BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 4:1-6

¹Kolkii Ciise ogaaday inay Farrisiintu maqlen inuu yeelanayay oo baabtiisayay xer ka badan intii Yooxanaa ²(in kastoo Ciise qudhiisu uusan baabtiisin, laakiin xertiisu way baabtiisayeen), ³ayuu Yuhuudiya ka tegey, wuxuuna mar kale u kacay Galili. ⁴Oo wuxuu lahaa inuu Samaariya dhex maro. ⁵Haddaba wuxuu yimid magaalada Samaariya, oo Sukhar la odhan jiray, oo ku dhowayd dalkii Yacquub siiyey wiilkiisii Yuusuf. ⁶Waxaana meeshaas jiray ceelkii Yacquub. Haddaba Ciise oo sodcaal ku soo daalav, wuxuu fadhiistav ceelka agtiisa. Saacaddiina waxay ku qiyaasnavd lixda.

4:1 “Rabigu” Yooxanaa, isaga oo dib u xasuusanaya sanado kaddib, ayaa wuxuu “Rabi” iyo “Ciise” ku dhex adeegsanayaa hal jumlad isaga oo hal shakhsi tilmaamaya.

Kuwo ka mida qoraal gacmeedyada Giriigga ayaa waxay qorayaan “Ciise” labo jeer aayadda 1 (a, D, NRSV, NJB, REB), laakiin “Rabbi” waxay ku sugantahay MSS P^{66, 75}, A, B, C, L (NASB, NKJV). Si kastaba ha

ahaatee, xitaa qoraal gacmeedyada caddaynaya “Rabbi” UBS⁴ qoraalka waxay ku dhigayaan “Ciise” waxaanay ku darayaan “C” (go’aan ka gaadhisteeduna way adagtahay).

▣ **“Farrisiintu”** eeg Mawduuca Gaarka ah 1:24

▣ **“maqlen inuu yeelanayay oo baabtiisayay xer ka badan intii Yooxanaa”** Ciise halkan waxa uu uga tegay iyadoo ay suurto gal ahayd inay xertiisa iyo kuwa Yooxanaa Baabtiisuhu ay ka hor yimaaddeen Farrisiintu. Injiillada kale waxay sheegayaan inuu ka tegay kaddib markii Herodos Antibaas uu xidhay Yooxanaa Baabtiisaha (Matayos 4:12; Markos 1:14; Luukos 3:20).

4:2 “in kastoo Ciise qudhiisu uusan baabtiisin” Tani maaha iyadoo la dhaleecaynayo baabtiiska (Matayos 28:19; Falimaha Rasuullada 2:38; 8:12; 16:33; 22:16), laakiin waa aqoonsashada dabiicadda aadanaha ee canaanimadu ku dhisantahay (“Waxa I baabtiisay Ciise” ama Bawlos, 1 Korintos 1:17). Dhinaca kale Ciise bilowgii shaqadiisa baabtiiska wuu sameeyay (3:22), laakiin markii danbe wuu joojiyay. Yooxanaa haddaba wuxuu saxayaa beenta Farrisiinta.

4:3 “Yuhuudiya ka tegey, wuxuuna mar kale u kacay Galili.” Waxa middan loo adeegsaday iyada oo la sheegayo Ciise goobihii juquraafi ahaaneed ee uu ku socdaalayey.

4:4 “Oo wuxuu lahaa inuu Samaariya dhex maro.” “laha” waa falka Giriigga ah ee *dei* dhowr jeer ayaana macnaha halkan lagu dhex adeegsaday (3:7, 14, 30). Hadiyo goorna waxa loo tarjumay “inuu” ama “lagama maarmaan.” Waxa jiray haddaba ujeedo Ilaahi ah oo khusaysay Ciise inuu wadadan maro. Waa wadada ugu gaaban; Josephus ayaana inoo sheegaya in Yuhuudda ka imanaysay Galiili ay wadadan isticmaali jireen. Si kastaba ha ahaatee, Yuhuudda aad ayay u necbaayeen Samaariyiinta oo kumanay dhex socon jirin dhulkooda, sababtuna waxay ahayd iyagoo ku tirin jiray dad leexday.

MAWDUUC GAAR AH: TAKOORKA

I. Hordhac

- A. Tani waa arrin caalami ah oo ka dhex jirta aadanaha denbiga ku dhacay. Haddaba, midab kala soocu wuxuu ku yimaaddaa siyaabo kala gedisan oo noqon kara takoor lagula dhaqaaqo qaybo ka mida dadka amaba qabiil.
- B. Kalaqaybsanka dadku waxa uu kasoo bilaabmay Baabel (Bilowgii 11), oo asal ahaanna waxa uu la xidhiidhay wiilashii Nuux ee saddexda ahaa (Bilowgii 10). Si kastaba ha ahaatee qoraallada Quduuska ahi waxay inoo sheegayaan in aadanuhu ay isku meel kasoo wada tafiirmeen (Bilowgii 1-3; Falimaha Rasuullada 17:24-26).
- C. Takoorku waxa uu ku salaysan yahay eexasho iyo caddaalad darro, waxaanu ku salaysan tusaale ahaan (1) Takoorku ku salaysan aqoonta; (2) isla weynida dhaqaalaha (3) diinta (4) siyaasadda, qabiilka iwm.

II. Baybalku muxuu arrintan ka leeyahay

A. Axdiga Hore

1. Bilowgii 1:27- cirqiga aadanaha oo isugu jir lab iyo dhedig, waxa laga abuuray ekaanshaha Ilaah, oo taasina waxay ka dhigaysaa kuwo ka gaara waxyaalaha kale ee Ilaah abuuray. Waxa kale oo ay tusaynasaa sida Ilaah u sharfay iyaga (Yooxanaa 3:16).
2. Bilowgii 1:11-25- waxa kusoo noqnoqta weedhaha “..caynkooda ah..” toban jeer. Waxaana loo adeegsaday kala soocooda. Si kastaba ha ahaatee qoraalkani waxa uu gaar u yahay oo tilmaamayaa xayawaanka iyo geedaha balse ma tilmaamayso aadanaha.
3. Bilowgii 9:18-27 waxa loo adeegsaday awoodda iyo maamulka dhaqan ahaaneed. Waa in la xusuusnaado Ilaah in aanu habaarin Kanaan. Nuux oo ahaa awowgiis ayaa habaaray markii isagoo sarkhaansan maro saari waayay. Sidoo kale Kitaabka Quduuska ahi ma tilmaamayo in Ilaaha uu ansixiyay habaarkaas, oo xitaa haddii uu sidaas sameeyeyna arrintani may saamayn

lahayn cirqiga madawga ah ee aadanaha. Kancaan waxa uu ahaa Falastiiniyiinta iyo Masaarida aabohood, sidoo kale sawirradii hore ee Masaaridu waxa ay muujinayaan in iyaga aanay ahayn kuwo madow.

4. Yashuuca 9:23- waxa ay tusinasaa in cirqiga aadanaha mid ka mid ahi u adeegi doono kuwa kale.
5. Cesraa 9-10 waxa loo adeegsaday dareen cirqi ahaaneed, laakiin ujeedadu waxay tusinasaa in guurka waxa looga mamnuucay aanu ahayn cirqi ahaantooda, laakiinse ay tahay sabab la xidhiidha xagga diinta.

B. Axdiga Cusub

1. Injiillada

- a. Ciise ayaa waxa uu tilmaamay nacaybka u dhexeeya Yuhuudda iyo Samaariyiinta, isaga oo tilmaamay in aanay habboonayn arrintaasi.
(1) Masaalka ninkii reer Samaariya ee wanaagsanaa (Luukos 10:25-37).
(2) Naagtii reer Samaariya ee ceelka joogtay (Yooxanaa 4)
(3) Adeegaha mahad celinta badan (Luukos 17:7-19).
- b. Injiilka waxa loogu talo galay dhammaanba aadanaha
(1) Yooxanaa 3:16
(2) Luukos 24:46-47
(3) Cibraaniyada 2:9
(4) Muujintii 14:6
- c. Boqortooyada Ilaah waxa soo hoos galaya aadanaha oo dhan
(1) Luukos 13:29
(2) Muujintii 5

2. Falimaha Rasuullada

- a. Falimaha Rasuullada 10 waxay sheegasaa jacaylka Ilaah u qabo aadanaha oo dhan iyo injiilka oo ah farriinta loogu talo galay dhammaanba aadanaha.
- b. Butros waxa lagu weeraray waxyaalihii uu samaynayay Falimaha Rasuullada 11 oo dhibaataadanna xal looma helin, illaa Guddigii Yerusaleem ay kulmeen oo xal la helay Falimaha Rasuullada 15. Xurguftii ka dhaxaysay Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn ee sanadkii koowaadi wuxuu ahaa mid awood badnaa.

3. Bawlos

- a. Dadku ma kala xigaan Masiixa
(1) Galatiya 3:26-28
(2) Efesos 2:11-22
(3) Efesos 6:9
- b. Ilaah dadka kuma tix geliyo muuqalkooda
(1) Rooma 2:11
(2) Efesos 6:9

4. Butros iyo Yacquub

- a. Ilaah dadka uma kala eexdo 1 Butros 1:17
- b. Waa inaan Masiixa eexasho lagu haysanin Yacquub 2:1

5. Yooxanaa

- a. Erayada ugu xoogga badan ee ah masuuliyadda saaran rumaystayaasha waxa laga heli karaa 1 Yooxanaa 4:20.

III. Ugu dambaynta

- A. Takoorku wuxuu koobsan karaa nooc walba oo gebi ahaanna kuma habboona carruurta Ilaah.
- B. Dhibaataadani waxay dadka Masiixiyiinta ah siin kartaa jaaniska ay ku muujin karaan jacaylka Ilaah, cafiska iyo fahanka dunidan luntay. Haddii se ay Masiixiyiintu arrintaas diidaan waxa imanaya jaaniska sharku uu ugu dhex faafiyo rumaysadka Masiixiyiinta.
- C. Maxaan qaban karaa? (Qoraalkan waxa laga soo qaatay Christian Life Commission mawduuca cinwaankiisu ahaa “waxyaalaha la xidhiidh cirqiga amaba takoorka”)

“SHAKHSI AHAAN”

- ★ Qaado masuuliyadda kaa saaran xallinta dhibaatooyinka la xidhiidha takoorka.

- ★ Adigoo ka tukanaya, akhrinaya Baybalka, weheshina la samaynaya daywoga cirqigoodu kala duwan yahay waxaad ka takhalusta waxyaalaha cunsuriyadda ah ee noloshaada la xidhiidha.
- ★ Soo ban dhig kalsoonida aad ka qabto cirqiga, gaar ahaan meelaha aan nacaybka lagaga hortegin.

“XAGGA NOLOSHA QOYSKA”

- ★ Aqoonso muhiimadda ku jirta saamaynta qoyska dhexdiisa ee horumarinta fikirrada laga aaminsanyahay cirqiga.
- ★ Raadi si Masiixinimo ah inaad uga hadasho waxyaalaha carruurta iyo guud ahaanba qoysku kaga hadlayaan cunsuriyadda.
- ★ Waalidiintu waa inay ka taxadiraan dejinta tusaale Masiixinimo oo la xidhiidha cirqiyada kale.
- ★ Raadi jaanisayada aad ku samayn karto saaxiibtinimada qoysaska kala gedisan.

“KANIISADDAADA DHEXDEEDA”

- ★ Ku wacdinta iyo waxbarista Kitaabiga ah ee ku saabsan cirqiga amaba takoorka, dadka kaniisadda ka tirsanina waxay tusaale u noqon karaan bulshada oo dhan.
- ★ Waxaad hubisaa in caabudaadda, is weheshiga, iyo adeegga kaniisadduba uu yahay mid u siman dadka oo dhan, xitaa sida Axdiiga Cusubi ina barayana kaniisadda dhexdeeda loogama baahna kala sooc (Efesos 2:11-22; Galatiya 3:26-29).

“NOLOL MAALMEEDKA”

- ★ Gacan ka gayso dhammaanba kala takoorka ka jira goobta shaqadaada.
- ★ Adigoo adeegsanaya ururrada bulshada isku day inaad ilaaliso xuquuqda shakhsi ahaaneed ee qof walba, adigoo xasuusanaya in takoorka la weeraro, balse aan dadka la weerarin. Ujeedadu waxa weeyi in la horu mariyo is fahanka iyo wada noolaanshaha.
- ★ Haddii ay suurto gal tahay, abaabul guddiyo gaara oo u kuur gala bulshada iyagoo markaasina samaynaya waxbaris iyo wacyi gelin ku saabsan takoorka oo ay siinayaan bulshada kala duwan.
- ★ Taageer siyaasadda iyo sharci dejinta ku waajahan caddaaladda iyo ka fogaanshaha takoorka, sidoo kalena kasoo horjeedo dhammaanba cidda ku baaqaysa midab kala sooca iyo takoorka.
- ★ Si fiican uula hadal sharciga iyo dadka awoodda leh ee xoojin kara ka hortagga takoorka.
- ★ Ka fogow fawdada, waxaanad tix gelisaa sharciga adigoo waxkasta oo suurto gal ah u samaynaya si Masiixinimo ku jirto, isla markaasna hubinaya inaanad noqonin qalab loo adeegsado takoorka.
- ★ Xidhiidhka aad la leedahay aadanaha oo dhamaa waa inuu noqdo mid tusaale u ah ruuxa iyo maanka Ciise Masiix.

▣ **“Samaariya dhex maro”** Waxa jiray nacayb badan oo dhexyaallay Yuhuudda iyo Samaariyiinta, waxaanu nacaybkaasi u noqonayay Qarnigii Sideedaad C.H. Sanadkii 722 C.H. Tobankii Qabiil ee Waqooyiga iyo magaaladooda Samaariya, waxa gacanta ku dhigay Ashuur waxaana la dejiyay Madaay (2 Boqorradii 17:6). Kuwii kale ee la qabtay iyana waxa la dejiyay woqooyiga Falastiin (2 Boqorradii 17:24). Wakhtiyo kadib ayaa dadkani waxay ka guursadeen Israa’iiliyiintii hadhsanayd, sidaasi darteedna Yuhuuddu waxay iyaga kasoo qaadeen dad aan tix gelinin diinta (Cesraa 4:1-4). Waxa laga arkayaa macnaha aayadda 9.

4:5 “magaalada Samaariya, oo Sukhar la odhan jiray, oo ku dhowayd dalkii Yacquub siiyey wiilkiisii Yuusuf.” (Bilowgii 33:18, 19; Yashuuca 24:32). Kuwo badan ayaa Sukhar u maleeya Shekem inkasta oo Axdiiga Cusubi aanu sheegin sidan.

4:6 “Waxaana meeshaas jiray ceelkii Yacquub” waxa uu ahaa ceel biyood qotodiisuna dheerayd. May ahayn biyo soconaya, laakiin waxay ahaayeen biyaha roobka oo la ururiyay. Haddaba, weligiis laguma sheegin Axdiiga Hore dhexdiisa, laakiinse magacu wuxuu la xidhiidhaa dhaqankii Batriyajalka.

▣ **“Ciise oo sodcaal ku soo daalay”** Waxa aan halkan ka arkaynaa dabecadda bani aadanimo ee Ciise (Luukos 2:52), laakiinse weligiis kamii daalin inuu dadka jeclaado!

▣
NASB, NKJV, JB “Saacaddiina waxay ku qiyaasnayd lixda”
NRSV, TEV “waxay ahayd ku dhowaad duhurkii”

Waxa jirta dood ka taagan nidaamka wakhti ahaaneed ee Yooxanaa uu ku dhex adeegsanayay Injiilkan. Maraajicda qaar waxay sheegayaan inuu ahaa wakhtigii Yuhuudda, kuwo kalena waxay sheegayaan inuu ahaa wakhtigii Roomaanka. Yuhuuddu maalinta waxay bilaabi jireen 6 a.m. (Roomaankuna duhurka). Haddaba, Ciise ceelka wuxuu yimid markii maalintu kululayd ee ahayd duhurka.

NASB (UPDATED) TEXT: 4:7-14

⁷Markaasaa waxaa timid naag reer Samaariya ah inay biyo dhaansato. Kolkaasaa Ciise wuxuu ku yidhi iyada, I waraabi. ⁸Maxaa yeelay, xertiisii magaaladay ku maqnaayeen inay cunto soo iibsadaan. ⁹Naagtii reer Samaariya ahayd waxay haddaba ku tidhi isaga, Sidee baad, adigoo Yuhuudi ah, biyo ii weydiisanaysaa, anigoo naag reer Samaariya ah? (Waayo, dan iskuma leh Yuhuudda iyo reer Samaariya.) ¹⁰Ciise waa u jawaabay oo ku yidhi iyada, Haddaad garanaysid hadiyaddii Ilaah iyo kuu yahay kan kugu leh, I waraabi, adigu waad wey- diisan lahayd isaga, oo wuxuu ku siin lahaa biyaha nool. ¹¹Naagtii waxay ku tidhi, Sayidow, waxaad biyo ku dhaansato ma haysatid, ceelkuna wuu dheer yahay. Haddaba xaggee baad ka helaysaa biyaha nool? ¹²Miyaad ka weyn tahay awowehayagii Yacquub oo ceelka na siiyey oo isaga qudhiisu ka cabbay iyo wiilashiisii iyo xoolihiisuba? ¹³Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi iyada, Kii kasta oo biyahan ka cabbaa, mar kale wuu harraadi doonaa, ¹⁴laakiin ku alla kii ka cabba biyahaan siin doono, weligiis ma harraadi doono, laakiin biyahaan siin doono waxay gudihiisa ku noqon doonaan il biyo ka duulayaan tan iyo nolosha weligeed ah.

4:7 “Markaasaa waxaa timid naag reer Samaariya ah” naagtu waxay meel fog uga timid ceelka iyadoo ahayd wakhti aan caadi ahayn oo maalinta ka mida, sababtuna waxay ahayd heerka ay ka taagnayd bulshadeeda xaafadda ku nool.

▣ **“I waraabi”** waa fal isla wakhtigaas taagan oo xanbaarsanaa hadal u baahan jawaab degdeg ah.

4:8 aayaddani waxay tilmaamaysaa Ciise wada sheekaysigiisa gaarka ah ee uu la lahaa naagtan Yuhuudda laga dhex necebyahay. Markale ayaa Yooxanaa uu arrintan uu si gaara u sheegayaa.

4:9 “Sidee baad, adigoo Yuhuudi ah, biyo ii weydiisanaysaa, anigoo naag reer Samaariya ah?” Xitaa Yuhuudda umay banaanayn inay Samaariyiinta meel wax kula wadaagaan (Laawiyiintii 15). Ciisena wuxuu iska dhaafay labo waxyaalood oo dhaqan ahaan aan ku banaanayn: (1) La hadalka Samaariyaan iyo (2) Inuu naag shaaraca kula hadlay.

▣ **“(Waayo, dan iskuma leh Yuhuudda iyo reer Samaariya.)”** faalladan dheeraadka ah (NASB, NRSV), oo markale Yooxanaa uu adeegsanayaa, waxay ka maqantahay MSS a iyo D, laakiinse waxay ku jirtaa P^{63, 66, 75, 76}, a, A, B, C, L. UBS⁴ kuna wuxuu kusoo darayaa “A”isagoo ku tirinaya (hubaal).

4:10 “haddaad” waa weedh shuruudeed heerka labaad ah laguna magacaabay “liddi ku ah xaqiiqada.” Waxa loo sameeyay iyada oo hadalku yahay been sidoo kalena gebogabadiisu tahay been.

Halkani waa meesha keli ee erayga “hadiyad” uu Yooxanaa kaga dhex adeegsaday Injiilkiisa. Waxa ayna halkan ku sheegaysaa in Ciise yahay hadiyadda Ilaah (3:16) kaasi oo bixiya nolosha weligeed ah. Yooxanaa 7:38-39 iyo Falimaha Rasuullada dhexdooda waxa loogu adeegsaday bixinta Ruuxa Quduuska ah (Falimaha Rasuullada 2:38; 8:20; 10:45; 11:17). Ujeedadu waxay tahay nimcada aan la galabsan ee Ilaah ku bixiyay Masiixa iyo Ruuxa.

▣ **“biyaha nool”** erayadani waxay yihiin tusaalayaal asalkoodu ku sugan yahay Axdiga Hore (Sabuurka 36:9; Ishacyaah 12:3; 44:3; Yereyaah 2:13; 17:13; Sekaryaah 14:8). Ciise erayada ah “biyaha nool” wuxuu u adeegsanayaa iyadoo la mida “nolosha ruuxiga ah.” Si kastaba ha ahaatee, naagtii Samaariyaanka ahayd waxay u malaysay biyaha soconaya, oo kasoo horjeeda biyaha ku dhex jira ceelka. Waxa Yooxanaa Injiilkiisu caan ku yahay in Ciise (nuurka dunidu) hadiyo goor aan si qaldan loo fahmay (Nikodemos). Xukunka dhulka ee aadanaha leexday maaha muu fahmo xukunka samaawiga ah (Farriinta Ciise).

4:11 “Sayidow” waa erayga Giriigga ah ee *kurios* qaabkeeda kalena waa *kurie*. Waxa loo adeegsan karaa akhlaaq ahaan (sayid) iyada oo fiqi ahaan sheegaysa (RABBI) isla markaana sheegaysa Ilaahnimada Ciise ee buuxda, sida ku sugan aayadda 1 iyo Rooma 1013. Halkan haddaba waxa weeyi xushmayn ahaan.

4:12 “Miyaad ka weyn tahay awowehayagii Yacquub” naxwe ahaan waxa la filayaa “maya” jawaabta ah. Waa hadal ay naagta Samaaritaanka ahi ku tusinayso waynaanta asalkeedu halka uu kasoo jeedo oo unoqonaya Efrayim iyo Manasaah oo Yacquub u noqonaya. Waxa la yaableh markaas, in Ciise awooddiisu ay sax tahay wixii uu ku sheeganayay!

Wada sheekaysigani wuxuu soo jeedinayaa labo arrimood oo fiqi ahaan ah.

1. Ilaah/Ciise jacaylkiisa uu u qabo kuwo la necebyahay (naagtii reer Samaariya)
2. Ciise waynaantiisa uu ku wayn yahay Yuhuudda

4:13-14 “laakiin ku alla kii ka cabba biyahaan siin doono, weligiis ma harraadi doono” tani waxay tusinaysaa waxyaalaha ku saabsan Masiixa ee laga fahmi karo (Ishacyaah 12:3; 48:21; 49:10). Erayadani waa kuwo ku xooggan diidmo laban laaba. Waxa laga dareemayaa dhawaaqa falalka in sida ka muuqata aayadda 13 ay sheegayso cabbitaan soo noqnoqonaya, laakiinse marka aan eegno aayadda 14 waxa ay sheegaysaa cabbitaan hal mar oo keliya ah.

4:14 “il biyo ka duulayaan tan iyo nolosha weligeed ah.” Waa fal taagan oo macnihiisu tahay “si joogto ah u soconaya” (Ishacyaah 58:11 iyo Yooxanaa 7:38). Dadka saxaraha ku nool, biyuhu waxay calaamad ugu ahaayeen nolosha iyo shaqada Ilaahiga ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 4:15-26

¹⁵Naagtii waxay ku tidhi, Sayidow, biyahan i sii inaan haddana harraadin oo aanan halkan iman inaan ka dhaansado. ¹⁶Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Tag oo ninkaagii u soo yeedh, oo halkan kaalay. ¹⁷Naagtii ayaa u jawaabtay oo ku tidhi, Nin ma lihi. Ciise wuxuu ku yidhi, Run baad ku hadashay, Nin ma lihi. ¹⁸Waayo, shan nin baad lahayd, kan aad haddeer haysatidna ninkaagii ma aha. Taas run baad ku sheegtay. ¹⁹Naagtii waxay ku tidhi, Sayidow, waan gartay inaad nebi tahay. ²⁰Awowayaashayo buurtan ayay ku caabudi jireen, idinkuse waxaad tidhaahdaan, Yeruusaalem waa meeshii la leeyahay in lagu caabudo. ²¹Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Naag yahay, i rume, saacaddu waa imanaysaa markii aydnaan Aabbaha ku caabudi doonin ama buurtan ama Yeruusaalem midnaba. ²²Idinku waxaad caabuddaan waxaydnaan oqoon, annaguse waxaannu caabudnaa waxaannu naqaan, waayo, badbaadintu waxay ka timaadaa Yuhuudda. ²³laakiin saacaddii baa imanaysa, waana joogtaa imminkada, markii caabudayaasha runta ihi ay Aabbaha ku caabudi doonaan ruuxa iyo runta, waayo, Aabbuhu wuxuu doonayaa caabudayaashaas oo kale. ²⁴Ilaah waa Ruux, kuwa caabudaa isagana waa inay ku caabudaan ruuxa iyo runta. ²⁵Naagtii waxay ku tidhi, Waa ogahay Masiixu inuu imanayo (kan Kristoos la yidhaahdo); oo markuu yimaado, wax walba ayuu noo sheegi doonaa. ²⁶Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Anigoo kula hadlaya ayaa ah isaYa.

4:15 naagtani ilaa hadda sidii Nikodemos oo kale, Ciise waxa ay ku qiimaynasaa oo u fahantahay jidh ahaan. Middanina waxay ahayd midaan xitaa xerta u ahayn caadi. Waxay xitaa badanaa si khaldan u fadirteen luqadiisii masaalladu ay ku dheehnaayeen (Yooxanaa 4:31-33; 11:11-13).

4:16 UBS⁴ xitaa ma sheegayo suurto galnimada ah in magaca “Ciise” lagu daray (NKJV, NRSV, NJB, REB). Kitaabka NET ayaa sheegaya caddaynta qoraal gacmeedyada koobsanaya (p. 1903, MSS a^c, A, C², D, L, iyo W, laakiinse way ka maqantahay MSS P^{66, 75}, B, C). culimadu waxay badanaa qoraalka ka dhigeen mid cad oo si fudud loo raaci karo.

☐ **“Tag oo ninkaagii u soo yeedh”** waa fal jooga oo isla markaasna la raaciyay amar la rabo in lagu dhaqaaqo.

4:17 “Nin ma lihi” denbiga waa in la waajaho. Ciise iskamuu indho tirin denbiga sidoo kalena muu xukumin.

4:18 “shan nin baad lahayd,” Ciise wuxuu adeegsanayaa cilmigiisa dabiicadda ka sarreeya si uu naagta uga dhaqaajiyo waxyaalaha jidhka uguna dhaqaajiyo waxyaalaha ruuxiga ah (1:48).

4:19 “waan gartay inaad nebi tahay.” naagtu ilaa hadda may u imanin fahanka Masiixa. waxanay isku dayaysay inay gees iska mariso xidhiidhkeeda ay la leedahay Ilaah iyadoo adeegsanaysa ammaan (sidi Nikodemos oo kale 3:2). Mufasiriin kale ayaa u arka in middanu ahayd wax ku saabsan Masiixa sida ku sugan Sharciga Kunoqoshadiisa 18:15-22.

MAWDUUC GAAR AH: WAXSII SHEEGIDDII AXDIGA HORE

I. HORDHAC

A. Odhaahda furitaanka ah

1. Dadka rumaysadka lihi ma waafaqsana sida loo tarjumo waxsii sheegidda. Xaqiiqooyinka kale waxa lagu aasaasay heerka ay dadka xag jirka ahi ka taagnaayeen qarniyo badan, laakiinse tan maaha.
2. Waxa jira siyaabo dhowra oo si fiican loogu qeexay waxsiisheegyada Axdiga Hore
 - a. Baraarugista nebiyada
 - 1) nebiyadii
 - a) Ibraahim – Bilowgii 20:7
 - b) Muuse – Tirintii 12:6-8; Sharciga Kunoqoshadiisa 18:15; 34:10
 - c) Haaruun – Baxniintii 7:1 (afhayeenkii Muuse)
 - d) Maryan – Baxniintii 15:20
 - e) Meedaaad iyo Eldaad – Tirintii 11:24-30
 - f) Deboraah – Xaakinnadii 6:7-10
 - g) Samuu’eel – 1 Samuu’eel 3:20
 - 2) iyadoo nebiyada koox ahaan loogu tilmaamayo – Sharciga Kunoqoshadiisa 13:1-5; 18:20-22
 - 3) (3) koox wax sii sheegta – 1 Samuu’eel 10:5-13; 19:20; 1 Boqorradii 20:35,41; 22:6,10-13; 2 Boqorradii 2:3,7; 4:1,38; 5:22; 6:1, iwm.
 - 4) Masiixa oo loogu yeedhay nebi – Sharciga Kunoqoshada 18:15-18
 - b. baraarugista aan qoraalka ahayn (waxay sheegaan boqorka)
 - (1) Gaad – 1 Samuu’eel 22:5; 2 Samuu’eel 24:11; 1 Korintos 29:29
 - (2) Naataan – 2 Samuu’eel 7:2; 12:25; 1 Boqorradii 1:22
 - (3) Ahijaaj – 1 Boqorradii 11:29
 - (4) Yeehu – Boqorradii 16:1,7,12
 - (5) lama magacaabin – 1 Boqorradii 18:4,13; 20:13,22
 - (6) Eliyaas – 1 Boqorradii 18-2 Boqorradii 2
 - (7) Miikayhuu - 1 Boqorradii 22
 - (8) Eliiyaah – 2 Boqorradii 2:8,13
 - c. nebiyadii wax qori jiray (iyagoo la hadlayay dadka iyo boqorrada): Ishacyaah-Malaakii (marka laga reebo Daanyeel)

B. Erayada kitaabiga ah

1. *Ro’eh* = “nebi” 1 Samuu’eel 9:9. Waxay sheegaysaa inay ka timid erayga *nabi*. *Ro’eh* asal ahaan waxay ka timid “arkitaan.” Qofkanina waxa uu fahmayaa qorshayaasha Ilaah iyo doonistiisa gaarka ah.
2. *Hozeh* = “nebi” 2 Samuu’eel 24:11. Asal ahaan waxay la mid tahay *Ro’eh*. Waxaanay ka timid “arkitaan.” Badanaana waxa loo adeegsaday nebiyada (“inay wax arkaan”).
3. *Nabi* = “nebi” waxay la mid tahay falka Akadiyaanka ah ee *Nabu* “baaq” luqada Carabidana waa *Naba’a* = “wargelin.” Haddaba eraygani waa ka ugu badan ee ka dhex muuqanaya Axdiga Hore iyadoo nebi loo adeegsanayo. Waxaana la adeegsaday in ka badan 300 jeer. Magaca ugu habboona lama garanayo laakiin “baaq” ayaa ah midka ugu haboon. Waxa suurto gal ah in fahanka ugu wanaagsani uu ka imanaho YHWH siduu u tilmaamay Muuse xidhiidhkii uu Haaruun kula lahaa Fircoon (Baxniintii 4:10-16; 7:1; Sharciga Kunoqoshadiisa 5:5. Nebiguna waa qof Ilaah ka socda oo dadka la hadla (Caamoos 3:8; Yeremyaah 1:7,17;

Yexesqeel 3:4).

4. Saddexda erayba waxa lagu dhex adeegsaday 1 Korintos 29:29; Samuu'eel – *Ro'eh*; Nataan – *Nabi* iyo Gaad – *Hozeh*.
5. Erayada ah, *ish ha – 'elohim* “Ninka Ilaah” sidoo kale iyana waxya tilmaamaysaa qofka ku hadlayay magaca Ilaah. iyadoo macnaha nebi samaynasa ayaa Axdiga Hore dhexdiisa waxa lagu adeegsaday 76 jeer.
6. Erayga “prohet” asalkiisu waa Giriig, waxaanay ka timaadaa: (1) *pro* = “ka hor” iyo (2) *phemi* = “hadal.”

II. QEEXITAANKA WAXSII SHEEGISTA

- A. Erayga “waxsii sheegis” macno ballaadhan oo ka wayn ka Ingiriisida ayuu ku dhex leeyahay Cibraaniyada. Kitaabada taariikhda ee Yashuua ilaa Boqorradii (marka laga reebo Ruud) Yuhuudda waxay u yihiin “waxsii sheegyo hore.” Ibraahim (Bilowgii 20:7; Sabuurka 105:5) iyo Muuse (Sharciga Kunoqoshadiisa 18:18) labadaba waxa lagu tiriyay nebiyo (sidoo kale Maryan, Baxniintii 15:20). Haddaba, qeexitaanka luqada Ingiriisida oo kale iska ka digtoonow.
- B. “Nebinimada waxa lagu qeexi karaa sida looga fahmo taariikhda, taasi oo aqbalaysa macnaha erayada waxyiga ah, ee ujeedadoodu waxyiga tahay.” *Interpreter's Dictionary of the Bible*, vol. 3, p. 896.
- C. “nebigu waa faylasuufi amaba fiqi yaqaan, laakiinse waa dhexdhexaadiye erayga Ilaah soo gaadhsiiya dadkiisa si mustaqbalkoodu ugu hagaago wakhti xaadirka ay joogaan, “Nebiyu iyo Waxsii sheegid,” *Encyclopedia Judaica* vol. 13 p. 1152.

III. UJEEDADA WAXSII SHEEGISTA

- A. Waxsii sheegistu waa dariiq Ilaah uu dadkiisa kula hadlo, isaga oo markaasna siinaya hagitaan iyo qorshaynta noloshooda dunida. Hadiyo goorna farriintoodu waxay ahayd iskaashi. Waxa loogala jeeday canaan, dhiirri gelin, rumaysad yeelasho iyo towbad keen, iyo in dadka lagu war geliyo wax ku saabsan Ilaah iyo qorshihisa. Waxay dadka Ilaah ku hogaamiyaan axdigiisa. Sidoo kalena Ilaah isaga ayaa doorta cidda isaga afkiisa ku hadlaysay (Sharciga Kunoqoshadiisa 13:1-3; 18:20-22). Middana waxa loo soo qaatay iyada oo la sheego inay tilmaamaysay Masiixa.
- B. Hadiyo jeer nebiga waxa lasoo darsa dhacdooyin taariikheed iyo kuwo fiqi ahaaneed oo wakhtigiisaa jooga. Haddaba, middani waxay gaar ku tahay taariikhda Israa'iil iyo macnaha ay xanbaarsanahay ee la xidhiidha doorashada axdiga Ilaah iyo ballan qaadyadiisa.
- C. Shaqada nebigu waxya u muuqataa inay dheelli tirayso (Yeremyaah 18:18) iyo inay qaadanaayo shaqada wadaadka sare ee ah aqoonta doonista Ilaah. Yuriimka iyo Tammiimku waxay ka hormaraan farriinta Ilaah ee ka imayanaysa ka isaga afkiisa ku hadlayay. Sidoo kale shaqada nebigu waxay in badan ka maqnaayd Israa'iil Malaakii dabadiis, waxaanay soo muuqanin oon nebi la arki muddo gaadhaysay 400 sano ilaa uu ka yimid Yooxanaa Baabtiisuhu. Haddaba, waa midaan la hubin sida hadiyadda “nebinimada” ee Axdiga Cusubi uula xidhiidho middii Axdiga Hore. Nebiyada Axdiga Cusubi (Falimaha Rasuullada 11:27-28; 13:1; 14:29,32,37; 1 Korintos 12:10,28-29; Efesos 4:11) maaha kuwo muujinaya waxyi ama Qorniin cusub, laakiinse waxa ay sii sheegayaan doonista Ilaah ee la xidhiidha axdiga.
- D. Waxsii sheegistu maaha mid si gaar ah loogu muujiyo dabiicadda. Waxsii sheegiddu waxay ansixinaysaa farriinta uu qofku xanbaarsanyahay, laakiinse waa in la ogaado “in kayar 2% waxsii sheegyada Axdiga Hore oo ku saabsan Masiixa. in ka yar 5% iyana waxay si gaara u sheegaysaa Casriga Axdiga Cusub. In ka yar 1% waxay khusaysaa dhacdooyinka aan weli iman,” (Fee iyo Stuart, *How to Read the Bible For All Its Worth*, p. 166).
- E. Nebiyadu xagga Ilaah ayay uuga socdaan dadka, haldka Wadaaduna xagga dadka ay Ilaah uugaga socdaan. Waxa jirta marar gaar ah sida Xabquuq oo kale, isaga oo su'aalo usoo jeedinayay Ilaah.
- F. Hal sabab ayaa fahankeedu adagyahay waana nebiyada oo aan taariikhyahano ahayn, maxaa yeelay garan mayno qaabka ay kitaabadoodu u salaysan yihiin. Xitaa ma jirto taariikho dejisan amaba wakhti iyo siyaabo kale oo lagu kala saari karo waxsii sheegyadooda. Kitaabadan waxa adag in (1) hal mar lawada akhriyo; (2) mawduucyadooda kormar lagu sameeyo; iyo (3) iyo in la ogaado xaqiiqada ku jirta amaba ujeedada waxsii sheegis karta.

IV. QAABABKA WAXSII SHEEGISTA

- A. Axdiga Hore dhexdiisa waxay u muuqataa in fikirka la xidhiidha “nebi” iyo “waxsii sheegis” uu Horumar samaynayay. Israa'iishii hore waxa jiray is wehesho nebiyada ah oo jiray, waxaana

hogaaminayay hoggaamiye xooggan sidii Eliyaas ama Eliyaah. Mararka qaar erayada “wiilasha nebiyada,” waxa loo adeegsaday sheegitaanka kooxdan (2 Boqorradii 2). Nebiyada waxa dabecad amaba qaab u ahayd farxad (1 Samuu’eel 10:10-13; 19:18-24).

- B. Si kastaba ha ahaatee, waxa jiray nebiyo badan. Waxa jiray nebiyo (isugu jira run iyo been) oo uu boqorku magacaabay, isla markaasna noolaa (Gaad, Nataan). Sidoo kale waxa jiray kuwo madax banaanaa, oo mararka qaar aan xitaa la xidhiidh la lahayn xaaladda shacabka Israa’iiliyiinta (Caamoos). Waxaanay isugu jireen rag iyo dumarba (2 Boqorradii 22:14).
- C. Nebigu hadiyo goor wuxuu ahaa mid muujiya waxa dhici doona mustaqbalka, taasina ay ku xidhantahay ka jawaaba celinta dhexdhexaadiintiisa. Badanaa shaqada nebiyadu waxay ahayd muujinta qorshaha Ilaah ee ku waajahan dunida iyo makhluuqaadka kuwaasi oon saamaynin ka jawaaba celinta aadanaha. Qorshahani wuxuu haddaba gaar ku ahaa nebiyadii Hore ee ku noolaa Bariga Dhexe. Waxsii sheegista iyo Axdigu waxay yihiin kuwo ku dheehan farriinta nebiga (Fee iyo Stuart, p. 150). Waxa middan laga fahmi karaa in nebiyadu hadiyo goorba ay yihiin kuwo jiheeya oo la hadla ummadda.
- D. Badanaa qalabka nebigu adeegsadaa waxay ahayd hadal, mardanbe ayaana lagu xidhay macnaha taariikh ahaaneed iyo sida wax u dhacayeen kuwaas oo inaga inaga lumay. Maadaama oo uu ahaa hadal oo qoraal ahaan loo qaabaynin, waxay middani akhrinta kitaabyada ka dhigaysaa adayg, waxaana adag sida lagu fahmo haddii aanay la soconin dhacdo taariikhi ahi.
- E. Nebiyadu tusaalayaal kala duwan ayay u adeegsadeen gudbinta farriintooda
 1. Muuqaal Maxkamadeed – Ilaah dadkiisa wuxuu u qaadayaa maxkamad iyadoo YHWH uu diidayo dadkiisa (Israa’iil) sababtuna ay tahay rumaysad la’aantooda (Hoosheeca 4; Miikaah 6).
 2. Xasuusin qiiri ah – nooca farriintan iyo qaabkeeda wuxuu leeyahay qaab gooni ah (Ishacyaah 5; Xabquuq 2).
 3. Ogaysiinta Barakada Axdiga – Dabiicadda shuruuddu ku xidhantahay ee Axdiga iyo cidhibta ka imanaysa, oo wanaag iyo xumaanba isugu jirta oo mustaqbalka lagu sheegay (Sharciga Kunoqoshadiisa 27-28).

V. JIHAYN GACAN KA GAYSAN KARTA FASIRAADDA WAXSII SHEEGIDDA

- A. Raadi ujeedada nebiga asalka ah adigoo u fiirsanayay dhacdooyinka taariikh ahaaneed iyo macnaha waxsii sheegis kasta. Hadiyo goor waxay koobsanaysaa Israa’iil oo jebinaya Sharcigii Muuse.
- B. Akhri oo fasir gebi ahaanba waxsii sheegista, oo qayb keliya uun ha fasirin, sidoo kalena macnaha calaamadi. Waxaad eegtaa sida ay ula xidhiidho waxa ku hareeraysnaa, adigoo isku dayaya kitaabka oo dhan inaad wada akhrido.
- C. Ka fikir fasiraadda suugaan ahaaneed ilaa inta uu qoraalka laftiisu uu kuu tilmamayo adeegsi tusaale ah; kaddibna tusaalaha ku eeg qoraalka.
- D. Calaamado fududayn ah raac adigoo adeegsanaya dhacdooyinka taariikhiga ah iyo aayadaha isku midka ah. iska hubi ama xusuusnow qaab suugaaneedka dadkii hore ee Bariga Dhexe oo ka duwan qaabka reer galbeedka.
- E. Waxsii sheegista si taxaddar ku jiro ula macaamilo
 1. Ma waxay gaar u ahaayeen maalhihii qoraaga?
 2. Halkee ayaa ay taariikhda Israa’iil kaga jiraan?
 3. Ilaa hadda ma dhacdooyin mustaqbal ahbaa?
 4. Ma waxay leeyihiin wax dhammays tirmay iyo wax iman doona?
 5. Qoraaga Kitaabka oon ahayn kuwa casriga ah u oggolow inuu hago jawaabahaaga.
- F. Walaacyo gaar ah
 1. Waxsii sheegista tayadeedu ma waxay ahayd jawaab shuruudi ku xidhantahay?
 2. Ma lahubaa cidda waxsii sheegista sheegay (sababtuna waa maxay)?
 3. Ma jirtaa suurta galnimo kitaabi ama taariikh ah oo tusinaysa dhammaystirka arrintan?
 4. Qorayaasha Axdiga Cusub oo waxyigu hagayaa waxay awoodeen inay waxsii sheegista ku saabsan Masiixa ka arkaan Axdiga Hore dhexdiisa kuwaasi oon inaga inoo caddayn. Waxay adeegsadeen erayadu sida ay u wada shaqeeyaan. Haddaba, maadaama oo aynaan waxyi ku soconin arrintan iyaga ayaan uga tegaynaa.

VI. KITAABO FAA’IDO LEH

- A. *A Guide to Biblical Prophecy* oo ay leeyahay Carle E. Amending iyo W. Ward Basque
- B. *How to Read the Bible for All Its Worth* oo ay leeyihiin Gordon Fee iyo Douglas Stuart
- C. *My Servants the Prophets* oo uu leeyahay Edward J. Young
- D. *Plowshares and Pruning Hooks: Rethinking the Language of Biblical Prophecy and Apocalyptic* oo

MAWDUUC GAAR AH: WAX SII SHEEGIDDA AXDIGA CUSUB

- I. Ma aha sidii wax sii sheegiddii Axdigii Hore, oo ahaa xidhiidh rabbaani ah oo ah muujinno waxyi oo YHWH ka yimid (cf. Falimaha Rasuullada 3:18,21; Rooma 16:26:.. Nebiyada oo qura ayey ahayd in ay Qorniinka qoraan
 - A. Muuse nebi ayaa lagu magacaabay (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15-21).
 - B. Buugaggii taariikhda (Yashuuca – Boqorrada [Ruut mooyee] waxaa lagu magacaabay “nebiyadii hore” (cf. Falimaha Rasuullada 3:24).
 - C. Nebiyadu waxa ay sidii booka Wadaadka Sare ugu jiran in farriinta ka soo gudbiyaan Ilaah (cf. Ishacyaah – Malaakii).
 - D. Aragtida labaad ee Cibraaniyada xeerkoodu waa “nebiyada” (Matayos 5:17; 22:40; Luukos 16:16; 24:23,27; Rooma 3:21).
- II. Axdiga Cusub dhexdiisa aragtida waxaa loo adeegsada dhowr waddoo oo kala duwan.
 - A. Iyadoo lagu tilmaamayo nebiyadii Axdigii Hore iyo farriintoodii waxyiiga (cf. Matayos 2:23; 5:12; 11:13; 13:14; Rooma 1:2)
 - B. Iyadoo lagu tilmaamayo farriin ku socota shaqi ama qof beddelkii kooxda wada jirta (nebiyadii Axdigii Hore waxay ugu horraantii la hadleen Israa’iil)
 - C. Iyadoo lagu tilmaamayo Yooxanaa baabtiisaha cf. Matayos 11:9; 14:5; 21:26; Luukos 1:7) iyo Ciise in labadooduba ay yihiin faafiyeyaasha Boqortooyad Ilaah (cf. Matayos 13:57; 21:11,46; Luukos 4:24; 7:16; 13:33; 24:19). Ciise sidoo kale wuu sheegay in uu Nebiyada ka weyn yahay (cf. Matayos 11:9; 12:41; Luukos 7:26)
 - D. Nebiyo kale oo Axdiga Cusub ku jira
 1. Noloshii Ciise horraanteedii sida ay ugu jirto Injiilka Luukos (i.e., Maryan suxuusheedii)
 - a. Elisabed (cf. Luukos 1:41-42)
 - b. Sakariyas (Luukos 1:67-79)
 - c. Simecoon (cf. Luukos 2:25-35)
 - d. Anna (cf. Luukos 2:36)
 2. Saadaashii aadka u adkayd (cf. Kayafas 11:51)
 - E. Iyadoo lagu tilmaamayo hal qof uu faafliya injiilka (taxa hadiyadaha faafinta eek u jira I Korintos 12:28-29; Efesos 4:11)
 - F. Iyadoo lagu tilmaamayo hadiyad kaniisadda dhexdeeda ka socota (cf. Matayos 23:34; Falimaha rasuullada 13:1; 15:32; Rooma 12:6; I Korintos 12:10,28-29; 13:2; Efesos 4:11). Mararka qaar tani qof dumar ah ayey timaami kartaa (Luukos 2:36; Falimaha Rasuullada 2:17; 21:9; I Korintos 11:4-5).
 - G. Iyadoo lagu tilmaamayo kittaabka Muujintii (cf. Muujintii 1:3; 22:7,10,18,19)
- III. Nebiyada Axdiga Cusub
 - A. Iyagu ma bixiyaan waxyi muujin ah si la mid ah sidii ay nebiyadii Axdigii Hore bixiyeen (i.e., Qorniin). Hadalkani waa macquul marka la eego adeegisa weedha “rumaysadka” (i.e., dareen ah injiil dhammays tiran) ayaa waxaa lagu adeegsaday (cf. Falimaha Rasuullada 6:7; 13:8; 14:22; Galatiya 1:23; 6:10; Filiboy 1:27; Yuudas 3,20).

Aragtidani waxa ay ku caddahay weedha buuxda ee Yuudas 3, “iimaankii mar la wada siiyey qoduusiinta oo dhan.” “iimaankii mar la wada” waxa ay tilmaamaysaa runta, fiqiga, ujeeddooyinka, iyo wax baridda Masiixiyadda ee aragtida adduunka. Qeexiddan ah mar la wada siiyey waxa ay sal u tahay fiqiga baybal ahaneed ee ah in qoraallo waxyi aha ah gebi ahaantood ku joogsadeen Axdiga Cusub, oo aan la oggolaanayn qoraal dambe oo dib laga qoro ama in qoraallo loo aqbal sidii wax waxyi ama muujin. Waxaa jira meelo badan oo aan la hubin, ama aan caddayn, oo midab dambari ah leh oo ku jira Axdiga Cusub, laakiin kuwa rumaysadka lahu rumaysad ayey ku qaadanayaan in wixii loogaa “baahan yahay” rumaysad iyo waxqabad ahu ay si toos ah ugu jiraan Axdiga Cusub. Habkan isaga ah ee qaadashada waxaa loogu yeeraa “the revelatory triangle.”

 1. Ilaah ayaa naf ahaantiisa mar is muujiyey (MUUJIN)
 2. Dad aadane ah ayuu u doortay in ay qoraan oo ay sharraxaan falimihiisa (WAXYI)

3. Ruuxiisii Qudduuska ahaa ayuu u bixiyey si uu u furo maskaxda iyo qalbiyada aadanaha si ay u fahmaan qoraalladan, ma aha muuqaalkooda, laakiin si ku filan badbaadada iyo nolol Masiixi oo wax tar leh (IFTIIMIN)

Tilmaanta meeshan ku jirta waxaa weeye in waxygii uu ku joogsada oo uu ku ekaaday Qorniinka. Maba ay jiri karaan qoraallo kale oo wata awood weyn, aragti, iyo muujin. Sharicgani ama qaynuunkani waa la xiray. Waannu haysanna run kasta oo aan u baahannahay in aan Ilaah ugu jawaabno.

Runtan waxa sida ugu fiican looga dhex arki karo waxaa weeye heshiiskii qoraayaasha baybalka ka dhexeeyay iyo tan kaloo ka soo hor jeeddo oo ah heshiisdarrada dadka Ilaah rumaysan ka dhex taagan. Ma jiro qof wax qora ama hadla oo casrigan la joogo keeni kara qoraal sidan isku raacsan sida Qorniinku yahay oo kale.

B. Waddooyinka qaar nebiyada Axdiga Cusub way kala mid yihiin nebiyadii Axdigii Hore.

1. Saadinta waxyaabaha mustaqbalka (cf. Bawlos, Falimaha Rasuullada 27:22; Agabos, Falimaha Rasuullada 11:27-28; 21:10-11; nebiyo kale oo aan la magacaabin, Falimaha Rasuullada 20:23)

2. Shaacinta xukunka (cf. Bawlos, Falimaha Rasuullada 13:11; 28:25-28)

3. Falimaha masaalka ah ee qeexaya dhacdo (cf. Agabus, Falimaha Rasuullada 21:11)

C. Waxa ay runta injiilka ku shaaciyeen qaabab saadaal ah (cf. Falimaha Rasuullada 11:27-28; 20:23; 21:10-11), laakiin tani ma aha waxa ugu horreeya ee diiradda la saarayo. Wax sii sheegidda ku jirta kitaabka I Korintos waxa ay sal ahaan xidhiidh la leedahay injiilka (cf. 14:24,39).

D. Waa isla xilligii Ruuxa oo muujinaya xilligii, falimihii dhaqan gelineed ee runta Ilaah oo ku aaddan xaalad kasta, dhaqan kasta, iyo mar ay wax dhacayaan (I Korintos 14:3).

E. Kuwowax qabad leh ayey ahaayeen xilligii kaniisadihii Bawlos (cf. I Korintos 11:4-5; 12:28,29; 13:29; 14:1,3,4,5,6,22,24,29,31,32,39,39; Efesos 2:20; 3:5; 4:11; I Tesaloniika 5:20) oo waxaa lagu sheegay Didache-ka dhexdiisa (kaasoo la qoray goor dambe oo qarnigii koowaad ama kii xigay ah, taariikhdu ma cadda) iyo Montanism-ka dhexdiisa oo la qoray qarniyadii labo iyo saddex waqooyinga Afrika dhexdeeda.

IV. Miyaa hadiyadihii Axdiga Cusub la joojiyey?

A. Aad ayey u adag tahay in su'aashan laga jawaabo. Waxa ay caawimaad ka qaadanaayaa qeexidda ujeeddada hadiyadaha. Ma waxaa macnahoodu yahay in ay xaqiijiyaan bilowga ku wacdinta injiilka mise waa waddooyinka aan joogsi lahayn ama socda oo u ah kaniisaddu in ay nafteeda iyo tan aduunka lumayba ay u adeegto?

B. Qofku ma wuxuu eegaa taariikha kaniisadda si uu su'aasha uga jawaabo mise Axdiga Cusub naftiisa? Ma jirto caddayn Axdiga Cusub dhexdiisa ku sugnaatay oo ah in hadiyadaha Ruuxu ay ku meel gaadh ahaayeen. Kuwii isku daya in ay adeegsadaan I Korintos 13:8-13 si ay u tilmaamaan arrintan, waxay caayayaan ama u gafayaan ku talo galkii qoraaga, kaasii sheegay in wax kasta ay dhimanayaan jacaylka mooyaane,

C. Waa la igu jarribayaa in aan idhaahdo, maaddaama uusan Axdiga Cusubi ahayn taarkhda kaniisadda, waa xukunka ama awoodda, rumaystayaashu waa in ay aqoonsadaan in hadiyaduhu ay weli socdaan oo aysan joogsanayn. Arrintu si kastaba ah ahaatee, waxaan filayaa in dhaqanku saameeyay fasiraadda. Qoraallada muuqda qaarkood wax sidaa u sii dheer dhaqan gelin u baahan sida dhaqannada qaar ku jirta. (i.e., dhunkashada qudduuska ah, dumarku in ay is daboolaan, kaniisadaha ku kulankooda guryaha, IWM). Haddii dhaqanku saameeyo waxa qoran, muusan taariikhda kaniisadda u noqon?

D. tani waxa ay si sahlan ku noqonaysaa in ay tahay su'aal aan si waadax ah looga jawaabi Karin. Rumaystayaasha qaar waxa ay ku doondi lahaayeen "waa joogsadeen" kuwa kalena "waa joogsi la'aan." Marka ay halkan taagan tahay, sida tafsiirro badan ay qabaan, qalbiga rumaystaha ayaa furaha ah. Axdiga Cusub waa aan la qiyaasi karin iyo dhaqan. Culayska meesha ku jira ayaa ah in la lahaado awood lagu go'aansado nooca qoraallada ee dhaqanka ama taariikhdu saameeyeen iyo kan kale ee abadiga ah(cf. Fee ito Stuart buuggooda la yiraahdo How to Read the Bible for All its Worth bogagga 14-19 iyo 69-77). Halkan ayaa ah meesha ay masuuliyadda iyo wada tashigu ka bilaabmayaan, ee laga helayo Rooma 14:1-15:13 iyo I Korintos 8-10, oo waa kuwo muhiim ah. Sidii aan su'aasha uga jawaabi lahayn labo waddo ayey muhiim ku tahay.

1. Rumayste kasta waa in uu rumaysad ugu socdaa nuurka ay haystaan. Ilaah waxa uu eegtaa qalbiyadeenna iyo ueeddooyinkeenna.

2. Rumayste kasta waa in uu u oggolaadaa rumaystayaashu in ay fahansanaan ugu dhex socdaan rumaysadkooda. Waa in dulqaad loo yeeshaa isku cufnaanta baybalka. Ilaah waxa uu naga doonayaa in aan is jeclaanno sida uu isaguba u sameeyo.

E. Si aan u soo gabogabayanno arrintan, Masiixiyaddu waa nolol rumaysad iyo jacayl leh, ma aha fiqiga oo dhammays tiran. Xidhiidh aan la yeelanno isaga oo saamayn u leh ridhiidhkeenna aan kuwa kale la leenahay ayaa aad uga wanaagsan warbxinta muuqata iyo kaamilnaanteeda.

4:20 “Awowayaashayo” middani waxa ay sheegaysaa Ibraahim iyo Yacquub (Bilowgii 12:7; 33:20). Waxay markaas sheegaysaa sida ay axdiga uga mid tahay (8:31-59).

▣ **“buurtan ayay ku caabudi jireen”** Waxa ay tilmaamaysaa meeshii YHWH lagu caabudi jiray. Yuhuuddu waxay ku sheegeen Buur Moriyah (dhinaca Macbadka Yuhuudda), halka Samaariyiintu ay kaga sheegeen Buur Gerisiim (Macbad Samaariyiintu lahaayeen oo 129 C.H uu baabiiyay John Hyrcanus).

Maanta wakhtigeenna aan joogno dad badan ayaa isku daya inay ka fogaadaan xidhiidhka Masiixa iyagoo isku dayaya inay keenaan fiqi qalloocsan. Aadanuhu way ku raaxaystaan barashada diinta iyo faylosufiyadda ilaa inta aanay ka saamaynayn iyaga shakhsiyadooda (3:19-21).

4:21 “saacaddu waa imanaysaa markii aydnaan Aabbaha ku caabudi doonin ama buurtan ama Yerusaleem midnaba” waxa ay middani ku noqonaysay iyada iyo xertiisaba arrin layaab leh. Goobtu maaha muhiimadda, laakiin waa ayo?

4:22 “badbaadintu waxay ka timaadaa Yuhuudda.” Tani waxay adkaynasaa asalka Masiixa (Bilowgii 12:2-3; 49:8-12; Ishacyaah 2:3; Rooma 9:4-5).

4:23 “laakiin saacaddii baa imanaysa, waana joogtaa imminkada” Waxay si maldahan u tilmaami kartaa Malaakii 1:11 oo ku saabsan caabudaadda caalamiga ah. Waxa muuqata in Ciise uu keenay hadiyadda nolosha weligeed ah intii uu noolaa iyo markii uu dhintay kaddib. Hadalkuna wuxuu ka tarjumayaa waxa u dhexeeya labada imaatin ee Masiixa. labadii casri ee Yuhuudda (eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 2:17) qayb ahaan ayaa hadda la daboolay. Casrigii Cusbaa ee Ruuxu wuu jooga, laakiinse ilaa hadda waxa aan ku dhex noolnahay da’dii sharka iyo denbiga.

Ciise waxa uu sheegay in da’da ama casriga cusubi uu isaga ka dhex bilaabmay. Casrigii Ruuxa, iyo casrigii Masiixuna waa ay yimaaddeen.

▣ **“ruuxa iyo runta,”** erayga “ruux” (eeg Mawduuca Gaarka ah 3:8) waxa uu ka hadlayaa caabudaad aan goob iyo jidh ku salaysnayn. Erayga “run” Giriigga dhexdiisa waxa loogu adeegsaday arrin la xidhiidha dhimirka, halka xagga Cibraaniga asalkiisu ka ahaa runsheegnimada. Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55 iyo 17:3.

▣ **“Aabbuhu”** Waxay ahayd midaa aad caadi u ahayn in Ilaah loogu yeedho “Aabbe” Axdiga Cusub dhexdiisa iyada oon lala xidhiidhinayn Ciise maadaama oo uu yahay Wiilka gaarka ah.

MAWDUUCA GAAR AH: AABBAHA

Axdiga Hore ee kitaabku waxa uu tilmaamayaa qaraabanimada Ilaah iyadoo lagasoo qaadayo Aabbe

1. Ummadda reer Israa’iil waxa lagu magacaabay inay yihiin carruurtii Ilaah (Hoosheeca 11:1; Malaakii 3:17).
2. Xitaa wakhtiyadii hore Shariciga Kunoqoshadiisa waxa Ilaah loogu yeedhay Aabbe (Shariciga Kunoqoshadiisa 1:31).
3. Shariciga Kunoqoshadiisa 32, dadka Israa’iil waxa lagu magacaabay ‘carruurtiisa’ halka Ilaahna lagaga magacaabay ‘Aabbihiiin’
4. Waxa lagu dhex sheegay Sabuurka 103:13 iyo sidoo kale Sabuurka 68:5 iyadoo lagu yeedhay Aabbaha agoomaha.
5. Waxay caan ka dhex ahayd nebiyada (Ishacyaah 1:2; 63:8; Israa’iil oo carruur ah, Ilaah oo Aabbe ah, 63:16; 64:8; Yeremyaah 3:4,19; 31:9).

Ciise Masiix waxa uu ku hadli jiray luqada Aramaatiga, sidaasi darteedna meelo badan oo ahayd ‘Aabbe’ ayaa waxa ay u muuqataa sida Giriigta waana *Pater* oo waxa laga yaabaa inay ka tarjumayso erayga Aramaatiga ah ee *Abba* (14:36). Haddaba, erayga ‘Aabbe’ waxa loogu isticmaalay Axdiga Hore Ilaah oo keliya, laakiin Ciise in badan ayuu isticmaalay. Waxaanay muujinaysa xidhiidhkeenna cusub ee aan Masiixa dartiis kula yeelannay Ilaah (Matayos 6:9).

▣ **“Aabbuhu wuxuu doonayaa caabudayaashaas oo kale.”** Ilaah waxa uu raadinayaa aadanaha lumay (Ishacyaah 55; Yexesqeel 18:23, 32; Luukos 19:10; Yooxanaa 1:12; 3:16).

4:24 “Ilaah waa Ruux” Waxa jira erayo dhowra oo Yooxaanaa qoraalladiisa ugu adeegsanayo tilmaanta Ilaah: (1) Ilaah waa jacayl; (2) Ilaah waa nuur; (3) Ilaah waa ruux. Middan waxa macneheedu noqon karaa (1) aan jidh ahayn; (2) aan la xadidi karin; (3) aan wakhti lagu qiyaasi karin ama (4) samada iyo dhulkaba jooga.

4:25 “Masiixu inuu imanayo” Erayga Messiah labo jeer oo keliya ayay kusoo dhex aroortay Axdiga Cusub, labadubana waa Injiilka Yooxanaa dhexdiisa (1:41; 4:25).

MAWDUUC GAAR AH: MASIIX

Waxa laga soo qaatay fiirada tafsiirkayga Daanyeel 9:6. Dhibaatada ka imanaysa fasiraadda eraygan ayaa ah iyada oo macnayaal kale oo suurto gal ah lala xidhiidhin karo (BDB 603).

1. Waxa loo adeegsaday boqorka Yuhuudda (1 Samuu’eel 2:10; 12:3)
2. Waxa loo adeegsaday wadaaddada Yuhuudda (Laawiyiintii 4:3,5)
3. Waxa loo adeegsaday Kuuros (Ishacyaah 45:1)
4. #1 iyo #2 waxa lagu xidhiidhiyay Sabuurka 110 iyo Sekaryaah 4
5. Waxa loo adeegsaday imaatinka Ilaah ee gaarka ah, Boqortooyada Daa’uud ee ay ka imanaysa casri cusub ee xaqnimada
 - a. Farcanka Yahuudah (Bilowgii 49:10)
 - b. Gurigii Yese (2 Samuu’eel 7)
 - c. Xukunka caalamiga ah (Sabuurka 2; Ishacyaah 9:6; 11:1-5; Miikaah 5:1-4ff)
 - d. Aniga shakhsi ahaan waxa isoo jiiday magaca Ciisah reer Naasereet lagu magacaabay ee ah “kan la doortay” sababtuna waa
 1. Hordhaca boqortooyada waaraysa ee cutubka 2 ilaa boqortooyadii afraad
 2. Hordhaca “wiilka aadanaha” ee 7:13 oo la siiyay boqortooyo waaraysa
 3. Erayada badbaadada ee 9:24, oo tilmaamaysa dhammaystirka taariikhda leexashada ee aadanaha
 4. Ciise adeegsigiisii uu kitaabka Daanyeel ku dhex adeegsaday Axdiga Cusub (Matayos 24:15; Markos 13:14).

▣ **“oo markuu yimaado, wax walba ayuu noo sheegi doonaa.”** Tani waxay muujinaysa in Samaariyuuntu ay filayeen Masiixa, sidoo kale waxay tusinaysaa inay Masiixa u arkayeen isaga oo si dhammays tiran Ilaah u muujin doona.

4:26 “Anigoo kula hadlaya ayaa ah isaga” Waxa laga yaabaa inay tahay hadalka maldahan ee Ishacyaah 52:6. Waxa ay tusinaysaa Ilaahnimadiisa (si uga duwan injiillada kale)! Waxa ay la mid tahay “Aniga” oo Axdiga Hore dhexdiisa loogu adeegsaday magaca YHWH (Baxniintii 3:12, 14). Ciise eraygan Axdiga Hore ku sugan waxa uu u adeegsaday inuu tusiyo is muujinta dhammayska tiran ee YHWH oo hadda si fiican Ciise looga dhex arkayo (Yooxanaa 8:24, 28, 58; 13:19; 18:5 barbar dhig Ishacyaah 41:4; 43:10; 46:4). Adeegsigan gaarka ah ee “Aniga” waa in laga sooco kan caadi ahaanta Yooxanaa hadalkiisa ugu jira, 6:35, 51; 8:12; 10:7, 9, 11, 14; 11:25; 14:6; 15:1, 5, kuwaasi oo la raaciyay magacyada.

NASB (UPDATED) TEXT: 4:27-30

²⁷Isla markii waxaa timid xertiisii, wayna la yaabeen markay arkeen inuu naag la hadlayo. Weliba ninna ma odhan, Maxaad doonaysaa? amase, Maxaad ula hadlaysaa iyada? ²⁸Sidaa aawadeed naagtii ayaa ashuunkeedii ka tagtay, oo magaaladay u baxday, oo waxay ku tidhi dadkii, ²⁹Kaalaya oo arka ninkii ii sheegay wax walba oo aan sameeyey. Miyaanu kani ahayn Masiixa? ³⁰Markaasay magaaladii ka soo baxeen, wayna u imanayeen isagii.

4:27 “wayna la yaabeen markay arkeen inuu naag la hadlayo” dhaqan ahaan middan may samayn jirin Yuhuudda xagjirka ahi.

▣ “Weliba ninna ma odhan, Maxaad doonaysaa? amase, Maxaad ula hadlaysaa iyada?” Tani waa faallada Yooxanaa oo ahaa markhaati goob jooge ah. Waxaana laga yaabaa inuu dhacdad si fiican u xasuustay!

4:28 “naagtii ayaa ashuunkeedii ka tagtay” Waa markhaati goob joog ah oo qurux badan, waxaanay tusinaysaa sida ay naagtana u faraxday iyada oo xaafaddeedii u laabatay si ay ugu markhaati furto (aayadaha 29-30).

4:29 “Miyaanu kani ahayn Masiixa?” naxwe ahaan waxa laga filayaa jawaabta ah “maya”, laakiin macnuhu waxa uu ina tusinayaa inay iyadu rumaysatay inuu yahay Isagii!

NASB (UPDATED) TEXT: 4:31-38

³¹Kolkaasay xertiisii baryeen iyagoo leh, Macallimow, wax cun. ³²laakiin wuxuu iyagii ku yidhi, Anigu waxaan haystaa cunto aan cuno oo aydnaan ogayn. ³³Haddaba xertiisii waxay isku yidhaahdeen, Ma loo keenay wuxuu cuno? ³⁴Ciise wuxuu ku yidhi, Cuntadaydu waa inaan sameeyo doonistii kii i soo diray oo aan shuqulkiisa dhammeeyo. ³⁵Miyaydnaan odhanin, Waxaa weli hadhay afar bilood oo markaas ayaa beerta la goynayaa? Bal eega, waxaan idin leeyahay, Indhihiinna kor u qaada oo daya beeraha inay u cad yihiin beergoyska. ³⁶Kii gooyaa mushahaaruu helaa, wuxuuna midho u ururiyaa nolosha weligeed ah, inay kii beera iyo kii gooyaaba isla farxaan. ³⁷Hadalku waa ku run kan, Mid baa beera, mid kalena waa gooyaa. ³⁸Waxaan idiin diray inaad gooyaan wixii aydnaan ku hawshoon. Kuwa kale baa hawshooday, hawshoodiina waad gasheen.

4:32 waa hadalkale oo maldahan kuna saabsan labanimada samada iyo dhulka, ruuxiga iyo jidhka. Ciise waxa uu ahaa wacdiye adeeg ku jira sidaasi darteedna dadka ayuu muhiimmada siinayay.

4:34 “Cuntadaydu waa inaan sameeyo doonistii kii i soo diray oo aan shuqulkiisa dhammeeyo.” Yooxanaa 17 ayaa si fiican u sheegaysa fahanka wixii Aabbuhu uu ka rabay inuu Ciise qabto (Markos 10:45; Luukos 19:10; Yooxanaa 6:29).

Farqiga u dhexeeya Ciise oo samada laga soo diray iyo joogitaanka Ilaah, ayaa waxa ay tahay iyada oo ay muhiimaddiisu tahay inuu muujiyo shaqada Aabbaha. Tanina waa qaabka laban laabka ah ee Yooxanaa adeegsanayo (sare iyo hoose, ruux iyo jidh).

Waxa jira labo eray oo kala duwan loona adeegsaday Ciise oo lasoo diray

1. *pempo* (4:34; 5:23, 24, 30, 37; 6:38, 39, 40, 44; 7:16, 18, 28, 33; 8:16, 18, 26, 29; 9:4; 12:44, 45, 49; 14:24; 15:21; 16:5)
2. *apostello* (3:17, 24; 5:36, 38; 6:29, 57; 7:29; 8:42; 10:36; 11:42; 17:3, 18, 21, 23, 25; 20:21)
3. Waa ay simanyihiin sida ay tusinayso 20:21. Sidoo kalena waxa ay tusinaysaa rumaystayaasha in loo diray dunida lunsan iyaga oo ka masuul ah ujeedada Aabbaha ee ku waajahan badbaadada (2 Korintos 5:13-21).

MAWDUUC GAAR AH: DOONISTA (thelema) ILAAH

INJIILKA YOOXANAA

- Ciise wuxuu u yimid in uu fuliyo doonista Aabbaha (cf. 4:34; 5:30; 6:38)
- In maalinta ugu dambaysa ay ku kacaan kuwa Aabbuhu siiyey wiilka (cf. 6:39)
- In dadka oo dhan ay rumeeyaan Wiilka (cf. 6:29,40)
- Salaadaha laga soo jawaabo oo la xidhiidha samaynta doonista Ilaah (cf. 9:31 iyo I Yooxanaa 5:15)

ARAGTIDA AY INJIILLADA KALE KA SIMAN YIHIIN

- Samaynta Ilaah doonistiisu waa lagama maarmaan (cf. Matayos 7:21)
- Samaynta doonista Ilaah waxa ay dadka ku walaalaysaa Ciise Masiix (cf. Matayos 12:50; Markos 3:35)
- In qof uu dhintoba ma aha doonista Ilaah (cf. Matayos 18:14; I Timoteyos 2:4; II Butros 3:9)

- In Ciise Masiix uu Golgota ku dhinto waxa ay ahayd doonista Aabbaha.

BAWLOS WARQADIHIISI

- Qaan gaadhnimada iyo adeegga rumaystayaasha dhamaantood (cf. Rooma 12:1-2)
- Runaystayaasha oo laga soo waday facii sharka (cf. Galatiya 1:4)
- Doonista Ilaah waxa ay ahayd qorshihisii soo madax furashada (cf. Efesos 1:5,9,11)
- Rumaystayaasha oo maraya kuna noolaanaya nolol uu Ruuxu hoggaaminayo (cf. Efesos 5:17-18)
- Rumaystayaasha oo ay aqoonta Ilaah ka buuxsantay (cf. Kolosay 1:9)
- Rumaystayaasha oo laga dhigay kuwo buuxa oo kaamil ah (cf. Kolosay 4:12)
 - Rumaystayaasha oo qudduus laga dhigay (I Tesaloniika 4:3)
- Rumaystayaasha oo shay kasta ka mahad naqaya (cf. Tesaloniika 5:18)

BUTROS WARQADIHIISI

- Rumaystayaasha oo xaq samaynaya (i.e., u hoggaansamaya xukuumadaha) oo isla marka ka aammusaya raga nacasiinta ah (cf. I Butros 2:15)
- Rumaystayaasha oo silcaya (cf. I Butros 3:17; 4:19)
- Rumaystayaasha oo aan ku noolayn nolol ay ay naftu udub dhexaad u tahay (cf. I Butros 4:2)

YOOXANAA WARQADIHIISI

- Rumaystayaasha ku jiriddooda weligeed ah (cf. I Yooxanaa 2:17)
- Waxa furaha u ahaa rumaystayaasha ducooyinkooda laga jawaabay (cf. I Yooxanaa 5:14)

4:35 “Waxaa weli hadhay afar bilood oo markaas ayaa beerta la goynayaa?” waa erayo tusaale ah isla markaana muujinaya jaaniskii ka jawaab celinta ruuxu inuu joogo hadda! Dadku waxa ay ahaayeen kuwo lagu badbaadiyay rumaysadka Ciise intuu noolaa oon ka ahayn xitaa sarakicista kaddib.

4:36-38 “Mid baa beera, mid kalena waa gooyaa.” Aayadahani waxa ay tilmaamayaan shaqadii nebiyada amaba waxa suurto gala Yooxanaa Baabtiisaha. Waxa middan lagu dhex adeegsaday 1 Korintos 3:6-8 waan xidhiidhkii u dhexeeyay shaqadii Bawlos iyo Abolloos.

NASB (UPDATED) TEXT: 4:39-42

³⁹Waxaa magaaladaas ka rumaystay isaga dad badan oo reer Samaariya ah. hadalkii naagta aawadiis, markay marag furtay oo tidhi, Wuxuu ii sheegay wax walba oo aan sameeyey. :⁴⁰Sidaa darteed markii dadka reer Samaariya ah u yimaadeen isaga, way baryeen inuu la joogo, wuxuuna halkaas joogay laba maalmood. ⁴¹Markaasaa kuwo kale oo badani rumaysteen hadalkiisii aawadiis, ⁴²oo waxay naagtii ku yidhaahdeen, Imminka waxaannu u rumaysanaynaa ma aha hadalkaaga aawadiis, maxaa yeelay. qudhayadu waannu maqalnay, waannuna naqaan kanu inuu runtii yahay Badbaadiyaha dunida.

4:39 “Waxaa magaaladaas ka rumaystay isaga dad badan oo reer Samaariya ah” Yooxanaa erayga “rumaysa” waxa uu adeegsanayaa isaga oo erayo kale ku xidhaya: “ka rumaystay” (*en*), “rumaystay in” (*hoti*), iyo hadiyo goor badanaa “rumaystay” (*eis*) (2:11, 23; 3:16, 18, 36, 18, 36; 6:29, 35, 40; 7:5, 31, 38, 48; 8:30; 9:35, 36; 10:42; 11:25, 26, 45, 48; 12:11, 3742, 44, 46; 14:1, 12; 16:9; 17:20). Asal ahaan Samaariyiintu waxa ay ku rumaysteen markhaati furka naagta (aayadda 39), laakiinse markii ay isaga shakhsi ahaan u maqleen ayay heleen markhaati furkiisa (aayadaha 41-42). Ciise waxa uu u yimid idaha lumay ee Israa’iil, laakiinse injiilkiisu ama warkiisa wanaagsani waxa uu u socday aadanaha oo dhan: Samaariyiinta, iyo asakartii Roomaanka (Rooma 10:12; 1 Korintos 12:13; Galatiya 3:28-29; Kolosay 3:11). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23.

▣ **“hadalkii naagta aawadiis,”** Haddii Ilaah uu adeegsaday markhaati furka naagta caynkaas ahayd, ogsoono inuu adeegsan karo kayga iyo kaagana sidoo kale! aayaddani haddaba, waxay tusinaysaa muhiimadda markhaati furka shakhsi ahaaneed. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 1:8.

4:40

NASB, NRSV “codsadeen”

NKJV

“waydiisteen”

TEV, NJB

“baryeen”

Way eray Giriig ah oo xooggan loona tarjumay “waydiisteen” ama “baryeen.” Xogaananaanta middan waxa laga arki karaa aayadda 47 intensity (Luukos 4:38).

4:42 “Badbaadiyaha dunida.” Magacan caalamiga ah mid la mida waxa lagu dhex isticmaalay 1 Yooxanaa 4:14. Sidoo kalena waxa loo adeegsaday macnaha caalami ahaaneed ee jacaylka Ilaah u qabo aadanaha oo dhan (1 Timoteyos 2:6; Cibraaniyada 2:9; 1 Yooxanaa 2:2). Ballan qaadkii Bilowgii 3:15 waa la dhammays tiray! Qarnigii hore dhexdiisa ereyadan waxa in badan loo adeegsaday Kaysar. Waxa jiray cadaadis ay Roomaanku samaynayeen maxaa yeelay Masiixiyiinta ayaa ereyadan u adeegsaday Ciise. Sidoo kale magacani waxa uu tusinayaa sida qoyraayadii Axdiga Cusubi magacyada Aabbaha ugu magacaabeen Wiilka: Tiitos 1:3 – Tiitos 1:4; Tiitos 2:10 – Tiitos 2:13; Tiitos 3:4 – Tiitos 3:6.

Yuhuuddu way diideen Ciise (1:11), laakiinse Samaariyiintu si dhakhso badan oo fudud ayay u rumaysteen Isaga (1:12)!

NASB (UPDATED) TEXT: 4:43-45

⁴³labadaas maalmood dabadeed meeshaas ayuu ka tegey oo Galili aaday. ⁴⁴Oo Ciise ayaa ka marag kacay inaan nebi waddankiis murwad ku lahayn. ⁴⁵Haddaba markuu Galili yimid, dadkii Galili way soo dhoweeyeen, iyagoo arkay wuxuu ku sameeyey Yerusaaalem oo dhan wakhtigii iidda, waayo, iyaguna iiddii way tageen.

4:43 aayaddani waxay tusinaysaa in Ciise uu in badan si xorriyada ugu dhex socday Yahuudiya iyo Galiili waana mid ka badan sida ay sheegayaan Injiillada kale.

4:44 aayaddani waa mid aan aad caadi u ahayn, maxaa yeelay maaha mid ku haboon macnihii socday. Waxa laga yaabaa inay sheegayso adeeggii Galiiliyaanka ee bilaabmi lahaa (4:3). Maahmaahdan sidoo kale waxa laga helayaa Matayos 13:57; Markos 6:4; Luukos 4:24. Injiillada kale dhexdooda waxay sheegaysaa Galiili, laakiinse halkan waxa weeyi Yahuudiya.

Waxa kaloo la sheegay in reer Galiili ay “aqbaleen” Ciise, laakiinse kuwo badan oo iyaga ka mid ahi may muujinin soo dhawayn. “rumays” iyo “aqbal” waxa ay koobsanayaan wax ka badan soo dhowaynta ugu horraysa oo kaliya (masaalka carrada ee Matayos 13:18-23; Markos 4:12-20; Luukos 8:11-15). Eeg Mawduuca Gaarka ah 8:31.

4:45 “dadkii Galili way soo dhoweeyeen,” Waxay hore u arkeen Ciise waxbaristiisa iyo mucjisooyinkiisa markii hore ee uu soo booqday Yerusaaalem ciiddii Kormarista. Waxay tani haddaba sheegaysaa inay Ciise isugu halleeyeen isagoo ah Masiixa Ilaah (1:12) ugu yaraan (aayadda 48).

☐ **“iyaguna iiddii way tageen”** kitaabka NET ayaa waxa uu ku sheegayaa faallada qoraaga, sida ay dhammaankba ku samaynayaan aayadda 44 (NRSV, NIV).

NASB (UPDATED) TEXT: 4:46-54

⁴⁶Haddaba mar kale ayuu yimid Kaana tii Galili oo ahayd meeshuu biyihii khamriga kaga dhigay. Meeshaasna waxaa joogay sirkaal wiilkiisii ku bukay Kafarna um. ⁴⁷Isagu markuu maqlay inuu Ciise Yahuudiya ka yimid oo Galili gaadhay, ayuu u tegey oo ka baryay inuu u yimaado oo wiilkiisa bogsiyo, waayo, dhimashuu u dhowaa. ⁴⁸Haddaba Ciise wuxuu ku yidhi, Haddaanad calaamooyin iyo yaabab arkin, marnaba ma rumaysan doontaan. ⁴⁹Sirkaalkii wuxuu ku yidhi, Sayidow, kaalay intaan wiilkaygu dhiman. ⁵⁰Ciise wuxuu ku yidhi, Soco, wiilkaagii waa nool yahay. Markaasaa ninkii rumaystay hadalkii Ciise ku yidhi, wuuna socday. ⁵¹Intuu socday ayaa addoommadiisii ka hor yimaadeen, iyagoo leh, Wiilkaagii waa nool yahay. ⁵²Markaasuu wuxuu iyagii weydiivey saacaddu ladnaaday. Waxay ku yidhaahdeen, Shalayto saacaddii toddobaad ayaa qandhadii daysay. ⁵³Markaasaa aabbuhu gartay inay saacaddaas ahayd saacaddii Ciise ku yidhi, Wiilkaagii waa nool yahay. Markaasaa isagii qudhiisu rumaystay iyo kuwii gurigiisii joogay oo dhan. ⁵⁴Haddaba tanu waa calaamadii labaad oo Ciise sameeyey markuu Yahuudiya ka tegey oo Galili yimid.

4:46

NASB, NRSV, NJB

“sirkaal”

NKJV

“madax ah”

TEV

“sarkaal dowladeed”

Waxa uu ahaa sarkaal xukuumadeed oo u adeegaysay Herodos.

4:48 “Haddaanad calaamooyin iyo yaabab arkin, marnaba ma rumaysan doontaan.” Waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah, waxaana la socda labo diidmo. Ciise ninkan waxa uu ula hadlay jamac ahaan. Haddaba, Yuhuuddu waxay raadinayeen calaamado (2:18; 6:2, 30; Matayos 12:38; 16:1). Laakiinse adeegahan Herodos waxa uu rumaystay intii aan la tusinin calaamooyinka.

4:49 “wiilkaygu” saddex aayadood ayaa Yooxanaa ku adeegsanayaa saddex eray oo kala duwan.

1. aayadda 49 – *paidion* (NASB, “ilme”)
2. aayadda 50 – *hyios* (NASB, “wiil”)
3. aayadda 51 – *pais* (NASB, “wiil”)

Waxa muuqata in ereyadan la adeegsaday iyaga oo isku mid ah.

4:50 Aayaddani waxay soo qabanaysaa ujeedada Injiilka Yooxanaa – rumaysadka Ciise, rumaysadka ereyadiisa, rumaysadka shuqulladiisa, rumaysadka shaqsiyaddiisa! Rumaysadka ninkan waxa lagu sheegay inuu rumaystay isaga oon arkin ballan qaadka Ciise.

4:53 “Markaasaa isagii qudhiisu rumaystay iyo kuwii gurigiisii joogay oo dhan” tani waa midda ugu horraysa waxyaabo badan oo qoran halkaasoo qof rumaysadkiisu uu saameeyay qoyska oo dhan.

1. Korneliyos (Falimaha Rasuullada 10:44-48)
2. Ludiya (Falimaha Rasuullada 16:15)
3. Filibiyon xabsihayihii (Falimaha Rasuullada 31-34)
4. Kirisbos (Falimaha Rasuullada 18:8)
5. Stifanos (1 Korintos 1:16)

Waxa jiray dood ka taagnayd kuwan guriga joogay, laakiinse waxa laga yaabaa inay sheegayso iyada oo dhammaanba xubnuhu u baahnaayeen aqbalitaanka Ciise. Bariga Dhexe waxa uu ku dhisanyahay qabiilo waanu ka duwanyahay dhaqamada casriga ah. waxa kaloo iyana runa in waxa fiican ee kuwa kale saamayn ku yeelato nolosheenna iyo ikhtiyarkeenna.

4:54 calaamaddii ugu horraysay waxay ahyad xafloodii arooska ee Kaana (2:1-11).

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay ahayd sababta Ciise uu uga tegay Yahuudiya?
2. Yooxanaa ma wuxuu adeegsanayaa goorsheegta Roomaanka mise ta Yuhuudda?
3. Maxay ahayd muhiimadda ku jirtay inuu Ciise la hadlo naagtii reer Samaariya?
4. Sidee aayadda 20 ay u saamaynasaa xidhiidhka ka dhexeeya madaahibta ee maanta?
5. Sharraxaad ka bixi hadalka ugu horreeya ee Ciise ku samayanayo aayadda 26?
6. Galiiliyaanku ma waxay la yimaaddeen rumaysad dhab ah?

YOOXANAA 5

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Wax ku bogsiintii warta	Ninkii lagu bogsiyey wartii Beytesda	Ninkii cuuryaanka ahaa ee la ma bogsiyey maalinta sabtida	Wax ku bogsiintii warta	Ninkii jirranaa ee lagu bogsiyey wartii Beytesda
5:1-9a	5:1-15	5:1 5:2-9a	5:1-6 5:7 5:8-9a	5:1-9a
5:9b-18		5:9b-18	5:9b-10 5:11 5:12 5:14 5:16 5:15-17 5:18	5:9b-18
	Xushmada Aabbaha iyo Wiilka			
Wax xukumidda Wiilka	5:16-23	Xidhiidhka Ciise la leeyahay Ilaah	Wax xukumidda Wiilka	
5:19-29		5:19-24	5:19-23	5:19-47
	Nolosha iyo xukunku Wiilka ayey soo maraan			
	5:24-30		5:24-29	
		5:25-29		
		Caddaynta xidhiidh Ciise la leeyahay Ilaah	Marqaati furro ku aaddan Ciise	
5:30		5:30	5:30	
Marqaati fur ku aaddan Ciise	Fourfold Witness			
5:31-40	5:31-47	5:31-38	5:31-40	
		Ciise oo kuwii hadiyaddiisa diiddan canaanaya		
		5:39-47		
5:41-17			5:41-47	

AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga v)
ADIGA OO RAACAYA UJEEKKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafsiiri lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiirka. Waa in aadan middan ula tegin qof kuu tafsiira..

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

1. Baaragaraaf-ka koowaad
2. Baaragaraaf-ka labaad
3. Baaragaraaf-ka saddeexaad
4. IWM.

NASB (UPDATED) TEXT: 5:1-9a

¹Waxaa dabadeed waxaa jirtay iiddii Yuhuudda, oo Ciise ayaa Yerusaaalem u kacay. ²Waxaa Yerusaaalem jirtay, Albaabka Idaha agtiisa, war biyo ah oo af Cibraani lagu yidhaahda Beytesda oo leh shan balbaladood. ³Meelahaas waxaa jifay dad badan oo buka oo indha la oo laxaad la' oo curyaan ah. Waxay sugayeen biyuhu inay dhaqaaqaan. ⁴Maxaa yeelay, malaa'igta Rabbiga ayaa marmar warta ku soo degi jirtay oo biyaha qasi jirtay; oo kii ugu hor galay biyihii markii la qasay dabadeed wuu ka bogsaday cudur kastuu qabay. ⁵Oo waxaa meeshaas joogay nin siddeed iyo soddon sannadood bukay. ⁶Markii Ciise arkay isagoo jiifa, oo gartay inuu wakhti dheer bukay, wuxuu ku yidhi, Ma doonaysaa inaad bogsato? ⁷Ninkii bukay wuxuu u jawaabay, oo ku yidhi, Sayidow, nin ma lihi inuu warta igu rido markii biyaha la qaso, laakiin markaan imaado, mid kale ayaa iga hor gala. ⁸Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Kac oo sariirtaada qaado oo soco. ⁹Markiiba ninkii waa bogsaday, wuuna qaatav sariirtiisii oo socday.

5:1 “iid” Qaar ka mid ah qoraalladii hore ee Giriigta sida N iyo C waxa ay ugu qoran “iiddii,” laakiin sida qoraalladu u badan yihiin waxaa ku qoran “iid” haddii aan eegno (P66, P75, A, B, iyo D). Waxaa jiray saddex maalmo iidood oo sannad kasta raga Yuhuudda si toos ah u sameeyaan haddii ay u suurto gasho (cf. Laawiyiintii 23): (1) Iidda Kor Maridda; (2) Bentekost; iyo (3) Iidda Taambuugga. Haddii middani ay la xidhiidho Kor Maridda, dabadeed Ciise waxa uu lahaa afar sano oo oo adeeg ah halka uu saddex ka tahay (cf. 2:13, 23; 6:4; 12:1). Waxaa dhaqan ahaan loo hayaa in Ciise adeeggiisu uu ahaa saddex sano oo si cad loo wada yaqaan markii Yooxanaa uu isaga baabtiisay kaddib. Tan waxaa kuu xaqiijinaysa oo qura tirade iidaha Kor maridda ee ku xusan Injiilka Yooxanaa.

☐ **“Ciise ayaa Yerusaaalem u kacay”** Waxaa la sheegay in Ciise uu dhawr jeer iido u aaday Yerusaaalem sida ku jirta Yooxanaa (cf. 2:13; 5:1; 7:10; 12:12).

Yerusaaalem waxa ay ka dul dhisnayd toddobo buurood oo yaryar, oo way ka dheerayd dhulka ku wareegsan. Sidaas daraaddeed, weedhan “kor ugu kacay” waa mid muuqaal u jirta. Si kasta oo ay ahaataba, waxa ay u muuqataa in uu ahaa tilmaan hadal maldahan ah. Yerusaaalem, macbudka dartiis, waxa ay ahayd meesha dhulka ama adduunka ugu sarraysa, oo tiir dhexaadda u ah (laf dhabarta) adduunka.

5:2 “Albaabka Idaha agtiisa” Albaabkan horintu waxa uu ku yiil qaybta waqooyi bari ee derbiga Yerusaaalem. Waxaa lagu sheegay Nexemyaah dib u habayntii uu ku sameeyey derbiyada magaalada sida ku qoran (cf. Nexemyaah 3:1, 32; 12:39).



NASB, NKJV “war biyo ah oo af Cibraani lagu yidhaahda Beytesda”
NRSV “Af Cibraaniga lagu yidhaahdo Bet-sata”
TEV “Afka Cibraaniga waxaa loogu yidhaahdaa Beytsata”
NJB “Beytesda lagu yidhaado”

Waxaa jira saddex nooc oo magacan loogu dhawaaqi karo. Josephus wuxuu sidoo kale ugu yeedhay magaca Cibraaniga ah “Beytsata” oo ahaa magacii qaybtan Yerusaaalem. Sidoo kale waxaa loogu yeedhaa Beytsa’ida sida qorniinnada Giriigga ku jirta. Qoraallada naxaasta ku dabooloan ee Qumram waxa ay ugu yeedheen meeshan “Beytesda,” oo macnaheedu yahay “gurigii naxariisa” ama “gurigii labada labada gu’.” Maanta waxaa loo yaqaan St. Anne’s pool(s), Warta St. Anne. Xilligii Ciise Yuhuuddii Falastiin joogtay waxa ay ku hadli jireen Afka Aramaygga, kuma aysan hadli jirin Cibraaniga. Sida ku jirta Yooxanaa marka uu leeyahay “Cibraani” waxaa laga wadaa Aramaygga (cf. 5:2; 19:13, 17, 20; 20:16; Muujintii 9:11; 16:16). Dhammaan hadalladii Ciise sida

1. *Talitha kum*, Markos 5:41
2. *Ephphatha*, Markos 7:34
3. *Eloi, Eloi, lama sabachthani*, Markos 15:34

Dhammaantood waxa ay ku jiraan luuqadda Aramaygga.

5:4 aayaddan waa tafsiir goor dambe ah oo isku dayaya in uu sharraxo

1. Waxa ay dadkii badnaa ay warta u joogeen
2. Sababtii uu ninkani waqti dheer halkaas u joogay
3. Sababtii uu u doonayey nin biyaha dhex geliya, sida ku jirta aayadda. 7

Waa mid si cad u muuqata in ay tahay sheeko ku saabsan koox Yuhuud ah. Maysan ahayn Injiilka rasmiga ah ee Yooxanaa. Caddaynta aayaddani ay meesha ugu jirayn ayaa ah:

1. In aysan ku jirin qorniinnada Quudduuska ah ee P66, P75, N, B, C*, D
2. Qoraalladii dambe ee Giriigta ee la sameeyayna waxaa la saaray calaamad, taasoo muujinaysa in loo maleeyey in aysan ahayn qoraalkii asliga ahaa.
3. Waxaa jira dhowr jeer oo weedhan la adeegsaday iyadoo aan ereyadii Yooxanaa ahayn.

Waxa ay ku jirtay dhowr qoraal oo kale oo kuwii aan soo sheegnay aan ahayn sida A, C3, K, iyo L. Waxay sidoo kale ku jirtay qoraalkii Diatessaron (muddo ku aaddan 180 A.D.), iyo qoraalladii Tertullian (200 A.D.), Ambrose, Chrysostom, iyo Cyril. Tani waxa ay muujinaysaa in middani ay waqti hore jirtay laakiinse ma aha ku jidhisteeda Injiilka waxyiga rasmiga ah. Waxaa laga dhex helayaa NKJV, NASB (la cusboonaysiiyey 1995, iyadoo labo qool ku jirta), iyo NKJV, laakiin NASB-ga (1970), NRSV, NJB, REB, iyo Baybalka NET iyo NIV-ga kuma jiraan.

Falanqayn wanaagsan oo ku saabsan kala duwanaanshaha qorniinnka ee ka imanaya qoraalka adage e ay gaarsiiyeyaashu sameeyeen, waxa aad ka arki kartaa, Kitaabka Gordon Fee, *To What End Exegesis?*, bogogga 17-28.

5:5-6 dhab ahaan sababta uu Ciise u doortay ninkan gaarka ah waa mid aynaan garan karin oo aynaan ogayn. Waxaa macquul ah in uu ahaa kan inta ugu badan halkaas joogay. Waxaa jirta in yar oo rumaysad ah oo ninkan qayb ahaan laga rabay. Waa ay iska muuqataa in Ciise uu isku dayayey in uu furo dood uu la yeesho hoggaamiyeyaasha Yuhuudda. Middani waxa ay isaga siisay fursaddii uu ku tusaalayn lahaa ahaanshihiisa in uu yahay Masiixa. Cutubka ka hadlaya xukunka ugu dambeeya ee Ishacyaah 35:6 dabcan waxa uu la xidhiidhay wax bogsiintan Masiixa.

Mucjisooyinkii Ciise masiix badankood looma samayn ugu horraynta shaqsi qura, laakiin kuwii daawanayey aawadood.

1. Xerta
2. Xukumaddii Yuhuudda
3. Kuwii badnaa

Injiillada ayaa xulanaya mucjisooyinka xaqiiqda u dhacay ee sida dhabta aha u muujinaya kan uu Masiixu ahaa. Dhacdooyiunkan waxa ay u taagan yihiin ficilladiisii maalmeed ee uu sameeyay. Waxaa la isugu keenay in ay muujiyaan

1. Shaqiga uu ahaa

2. Naxariistiisii
3. Awooddiisii
4. Xukunkiisii
5. Muujintiisii tooska ahayd ee Aabbaha
6. Muujintiisii caddayd ee da'da uu Masiixu jiri lahaa

5:8 “Kac oo sariirtaada qaado oo socio.” Kuwani waa amarro dhab ah

1. Waa amar fal taagan oo toosan
2. Waxaa la socda AORST oo amar fal toosan ah
3. Haddana waxaa la socda amar fal toosan oo taagan

Sariirtu waxa ay ahayd dhar sidii jiimbaarta loo sameeyo oo dadka saboolka ah ay sariir ahaan u isticmaali jireen. Dadka jirran, ama naafada ah, ama dhaqdhaqaaqa gabay waxa ay u ahayd gambadh ay maalinta ku fadhiistaan (cf. Markos 2:4, 9, 11, 12; 6:55; falimaha Rasuullada 9:33).

NASB (UPDATED) TEXT: : 5:9b-18

⁹“Maalintaas waxay ahayd sabtidii. ¹⁰Sidas daraaddeed Yuhuuddu waxay kii la bogsiiyey ku yidhaahdeen, Waa sabti, oo xalaal kuuma aha inaad sariirtaada qaadatid. ¹¹laakiin wuu u jawaabay, oo ku yidhi, Kii i bogsiiyey ayaa igu yidhi, Sariirtaada qaado oo socio. ¹²Oo waxay weydiiyeen, oo ku yidhaahdeen, Yuu yahay ninkii kugu yidhi, Sariirtaada qaado oo socio? ¹³Kii la bogsiiyeyse ma uu oqoonin kuu ahaa, waayo, Ciise waa tegey, maxaa yeelay, dad badan ayaa meeshaas joogay. ¹⁴Waxaa dabadeed Ciise wuxuu isaga ka helay macbudka oo ku yidhi, Bal eeg, waad bogsatay, mar dambe ha dembaabin inaan wax ka sii xumi kugu dhicin. ¹⁵Markaasaa ninkii tegey, wuuna u sheegay Yuhuuddii inuu ninkii bogsiiyey Ciise ahaa. ¹⁶Sidaa aawadeed Yuhuuddu Ciise way silciyeen, maxaa yeelay, wuxuu waxyaalahaas sameeyey sabtidii. ¹⁷laakiin Ciise wuxuu ugu jawaabay, Aabbahay tan iyo imminka ayuu shaqeeyaa, aniguna waa shaqeeyaa. ¹⁸Sidaa aawadeed ayaa Yuhuuddu aad u sii dooneen inay dilaan, sababtu ma ahayn sabtidii uu jebiyey keliya, laakiin waxay ahayd inuu Ilaah ugu yeedhay Aabbihiis, iyo inuu isagu Ilaah iskala mid dhigay.”

5:9b “Maalintaas waxay ahayd sabtidii” Oo hoggaamiyeyaasha Yuhuuddu xitaa kuma aysan farxin ninkii la bogsiiyey, laakiin waxa ay Ciise ku eedeeyeen Dhaqankii afka ahaa (oo goor dambe lagu nidaamiyey sharcigii Yuhuudda u degganaa) ee la xidhiidhay maalinta Sabtida (cf. aayadaha. 16, 18; Matayos 7:1-23).

Ciise Masiix wax bogsiiintii waxaa loo sharrixi karaa labo hab.

1. Maalin kasta ayuu wax bogsiiinayey laakiin iska hor imaadku wuxuu yimid wax bogsiiintii maalintii Sabtida
2. Wuxuu arrintan u doortay in uu dood ku sababo taasoo ah fursan hoggaamiyeyaasha diinta loogu kaxaynayo wada hadal xagga fiqiga ah, oo ah in Ciise uu mar kasta Sabtida wax bogsiiyo (cf. 12:9-14; Markos 1:29-31; 3:1-6; Luukos 6:6-11; 14:1-6; Yooxanaa 5:9-18; 9:14).

Ciise Sabtida ayuu jinniyo saaray (cf. Markos 1:21-28); (Luukos 13:10-17). Ciise wuxuu difaacay maalintii Sabtida ahayd ee ay xertu wax cuntay (cf. Matayos 12:1-8; Markos 2:23-28). Ciise ficillo uu kaga soo hor jeedo ayuu sabtida keenay sunagogga (Luukos 4:16-30; Yooxanaa 7:14-24).

5:13“Ciise waa tegey” macne ahaan tani waxa ay noqnaysaa “dhan ayuu u huleelay, oo uu madaxiisii u jeediyey.” Ciise waxa uu u ekaa uun Yuhuudi caadi ah maalmihiisii. Dadkii badnaa ayuunbuu ku dhex milmay.

5:14

NASB, NKJV

NJB

KJV

TEV

“wax intaa ka sii badan ha dembaabin”

“mar dambe ha dembaabin”

“haddaba jooji dembaabista”

Kani waa fal taagan oo toosan oo uu ereyga diidmadu la socdo, oo macnuhu yahay in falakii lagu jiray horayba loo joojiyo, laakiin marka macnaha guud ahaaneed la eego waxa uu u muuqdaa mid ka duwan (cf. NET Bible, bogga 1907 #8). Culimadii fiqiga ee Yuhuudda ee qarnigii koowaad, waxa ay jirrada ku macneeyeen in ay la xidhiidho dembiga (cf. Yacquub 5:14-15). Tani ma sharraxayso jirro oo dhan, sida laga arki karo sidii uu ciise

masiix ula macaamilay ninkii indho la'aanta ku dhashay(cf. Yooxanaa 9 iyo Ciise Masiix ereyadiisii ee ku jira Luukos 13:1-4).

Ciise Masiix wuxuu weli eegayey nolosha Ruux ahaaneed ee ninkan. Ficilladeennu waxay dibadda u soo saaraan ama muuqaal ahaan u soo celiyaan qalbigeenna iyo rumaysadkeenna. Rumaysadka Kitaabka Qudduuska ahu waa fal wax samaynaya iyo mid la samaynayo, iimaan iyo ficil labadaba.

Maantadan weli middan ku saabsan bogsiinta jidh ahaaned way ka jirtaa kaniisadda. Hubaal, Ilaah weli wax wuu bogsiyaa. Laakiin bogsiinta rabaaniga ah waxa ay natiijo ahaan ka soo if baxdaa is beddelka Ruux ahaaneed ee qaabka nolosha iyo mudnaanta. Waxaa su'aal aad u wanaagsan ah “sababtee ayaan in lagu bogsiyo ku doonaysaa?”

MAWDUUC GAAR AH: BOGSIINTU MA QORSHE ILAAH DA' KASTA UGU TALO GALAY BAA?

1. Bogsiintu waxa ay ahayd arrin ahmiyad weyn ku dhex leh adeegii Masiixa iyo rasuulladii.
2. Waxaa loogu talo galay markii horeba in lagu caddeeyo ama lagu muujiyo farriinta cusub ee ku saabsan Ilaah iyo Boqortooyadiisa.
3. Waxa ay muujinaysaa waxa Ilaah u hayo dadka dhaawacan.
4. Ilaah muusan beddelin (Matayos 3:6) oo weli bogsiintiisii jacaylka lahayd wuu wadaa.
5. Waxaa jira tusaalooyin ku daabsan bogsiintu halkayan ka dhicin.
6. Bawlos, II Korintos 12:7-10
7. Tarofimos, II Timoteyos 4:20
8. Dembiga iyo jirradu waa ay wada xidhiidhaan marka aad eegto sharcigii Yuhuudda iyo Yacquub (cf. Yooxanaa 9:2; Yacquub 5:13-18).
9. Bogsiintu ma aha mid Axdiga Cusubi uu kafaala qaadayo ama ballan qaadayo. Qayb kama aha kafaaragudka ku qeexan Ishacyaah 53 iyo Sabuurka 103.
10. Waxaa jirta run yaab leh oo ku saabsan wixii qaar loo bogsiyey qaarna aan loo bogsiin.
11. Waxaa macquul ah in inkastoo bogsiintu ay la joogto fac kasta, ay bogsiintu aad u korortay ama siyaadday waqtigii Masiixsu noolaa; bogsiintan way dhici doontaa mar kale inta uusan soo noqon ka hor.

5:15 “Markaasaa ninkii tegey, wuuna u sheegay Yuhuuddii” Ujeedka dhabta ah ee ka dambeeya usheegiddiisa maammulka Yuhuddu ma qeexna.

1. Waxay u muuqataa in ay tahay ka fikir la'aan, macnaha ficil yar oo muujinaya in bogsiintu aysan ahayn mid la bilaabanta rumaysadka oo la dhammaata rumaysadka
2. Ciise ayaa sidaas u sheegay inuu sidaa sameeyo (cf. Matayos 8:4; Markos 1:44; Luukos 5:14; 17:14)

5:16 “maxaa yeelay, wuxuu waxyaalahaas sameeyey sabbidii” Ereygan fal sameeyaha ahu fal amar taagan oo toosan oo muujinaya ficil is daba jog ahaa ama socday waqti la soo dhaafay. Tani ma ayan ahayn Ciise wax bogsiintiisii ugu horraysay (ama ugu dambaysay) Sabbida!

5:17

NASB

“laakiin Ciisaa ugu jawaabay”

NKJV, REV

NRSV, NIV

“laakiin Ciise wuxuu ugu jawaabay”

NJB

“jawaabtiisii iyaga ku aaddanayd waxay ahayd”

Qoraayaashii min guuriyey qorniinnadii Giriigga ee ugu hoorreeyay waxay lahaayeen qaab ay

1. Ku ududeeyaan naxwaha
2. Ku sameeyaan tixraacyo muuqda oo caan ah
3. Weedha isku hab isugu nidaamiyaan

Way adag tahay in la ogaado qaabkii ay aayadda. 17 asli ahaan u dhisnayd.

1. “Laakiin Isaga. . .”- P75, N, B, W
2. “Laakiin Ciise. . .”- P66, A, D, L
3. “Laakiin Rabbiga. . .” ama “Rabbiga ah Ciise”- Tarjumaadihii Syriac

UBS4 waxa uu bixiyaa soo jeedinta #2 “C” oo xadaynaysa (in ay adag tahay in la go'aansado).

▣ **“Aabbahay tan iyo imminka ayuu shaqeeyaa, aniguna waa shaqeeyaa.”** Kuwan, labada weedhoodba waa fal taagan oo dhexe oo wax tusmaynaya. Ciise waxa uu halkan ku sheegayaa in aabbuhu uusan joojin in wanaagga sameeyo Sabtida oo uu Wiilkuna sidoo kale samaynayo (falanqayn fiican oo aayaddan ku saabsan waxa aad ku arki kartaa Manfred Brauch, *Abusing Scripture*, bogga 219). Middan, tan rasmi ahaan laga dhadhamin karo, waa muujintii Ciise ogsoonaantiisii ahayd xidhiidhka aan wax loo dhigaahi jirin ee uu la lahaa Aabbaha (cf. aayadaha. 19-29).

Ujeedkii Yuhuudda ee ku saabsanaa MONOTHEISM ka sida ku jirta (cf. 6:4) waxaa si ficil ahaan ah loogu qeexay “hal sabab” sharraxaad ka bixinta dhacdooyinka adduunka (cf. Xaakinnadii 9:23; Ayuub 2:10; Waxdiyaha 7:14; Ishacyaah 45:7; 59:16; Baroorashadii Yeremyaah 3:33-38; Caamos 3:6). Falimahaas oo dhammi waxa ay ahaayeen kuwii Ilaaha keliya ee runta ah. Markii Ciise tilmaamay lammaanaanta wakiilnimada ee ku jira Ilaah falimihiiisa adduunka dhexdiisa, waxa uu ku tilmaamay lammaanaan si rabbaani wax loo samaynayo. Waa middan culayska kira ee ah fahan la’aanta saddexmidnimada. Hal Ilaah, balse saddex shaqi kala ah ama muuqaal kala leh (cf. Matayos 3:16-17; 28:19; Yooxanaa 14:26; Falimaha Rasuullada 2:33-34; Rooma 8:9-10; I Korintos 12:4-6; II Korintos 1:21-22; 13:14; Galatiya 4:4; Efesos 1:3-14; 2:18; 4:4-6; I Butros 1:2). Mawduuc Gaar ah ka eeg: Saddexmidnimada 14:26.

▣ **“Sidaa aawadeed ayaa Yuhuuddu aad u sii dooneen inay dilaan”** Waxaa jiray labo sababood oo ay Yuhuuddu u rabeen in ay dilaan Ciise Masiix

1. Wuxuu si lawada arko u jebiyey (macne ahaan waa “muusan daryeelin ama muusan dhawrin.” Waa reryaan dhammaystirmin xagga naxwaha oo ah fal toosan oo wax tilmaamaya. (cf. Matayos 5:19) Dhaqankii Afka ahaa ee (Talmud) ee quseeyay Sabtida
2. Hadalkiisii ayaa waxa uu muujiyey in ay Isaga u fahmeen in uu in uu ku andacoonayo in uu Ilaah la siman yahay (cf. 8:5-8-59; 10:33; 19:7)

NASB (UPDATED) TEXT: : 5:19-23

¹⁹Haddaba Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Wiilku keli ahaantiis waxba ma samayn karo, wuxuu arko Aabbahoo samaynaya mooyaane. Wax kastoo isagu sameeyo ayaa Wiilkuna sidiisa u sameeyaa. ²⁰Waayo, Aabbuhu Wiilkuu jecel yahay, oo wuxuu tusaa wuxuu isagu sameeyo oo dhan, oo wuxuuna tusi doonaa shuqullo kuwan ka waaweyn inaad la yaabtaan. ²¹Sida Aabbuhu kuwa dhintay u kiciyo oo u nooleeyo ayuu Wiilkuna sidaas oo kale u nooleeyaa kuwuu doonayo. ²²Aabbuhu ninna ma xukumo, laakiin xukunka oo dhan wuxuu siiyey Wiilka, ²³in dadka oo dhammu Wiilka murweeyo siday Aabbaha u murweeyaan. Kii aan Wiilka murwayn, ma murweeyo Aabbaha soo diray.

5:19, 24, 25 “runtii, runtii” Tani waxa ay macne ahaan noqonaysaa “Aammiin, aammiin.” Ereyga “aammiin” Ereygan waxaa laga soo tarmuntay qoraalka Cibraaniga. Asalka macnihiisu waxa uu ahaa la aammiin karo ama lagu kalsoonaan karo. Waxa ay saan ku noqotay in loo isticmaalo in runta lagu muujiyo ama lagu adkeeyo. Ciise oo qura ayaa ah kan la og yahay ee ereygan u adeegsaday jumlad bilowgeed. Waxa uu u adeegsaday arar hadal muhiim ah. Yooxanaa oo qura ayaa ah kan qoray ama diwaanka geliyey labo ka dhigidda ereygan hadalka lagu bilaabay. Ka Eeg Mawduuc Gaar ah: Aammiin 1:51.

5:19 “Wiilku” Waxaa jirta kusoo celcelin macne weyn leh oo fiqi ahaaneed oo ku saabsan ereyga “wiilka” dhowrka aayadood ee soo socda gudahooda. Macnahan kooban dhexdiisa siddeed jeer ayaan lagu isticmaalay. Waxa uu muujinayaa Ciise fahankiisa aan wax lala simaahi jirin ee ku saabsan xidhiidhkiisa uu la leeyahay Aabbaha oo waxa uu ban bixiyey magacyada ah “Wiilka Aadanaha” iyo “Wiilka Ilaah.”

▣ **“Wiilku keli ahaantiis waxba ma samayn karo”** Sida ay badan, Axdiga Cusub wuxuu si hubaal Ciise Masiix ugu qeexayaa qeexitaanno aad mooddo in ay iska hor imanayaan. Qoraallada qaarkood sida ku jirta

1. Waan midka la jira Aabbaha (cf. 1:1; 5:18; 10:30, 34-38; 14:9-10; 20: 28)
2. Waa mid ka gooni ah Aabbaha (cf. 1:2, 14, 18; 5:19-23; 8:28; 10:25, 29; 14:10, 11, 12, 13, 16; 17:1-2)
3. Isagu waa mid hoos jooga Isaga (cf. 5:20, 30; 8:28; 12:49; 14:28; 15:10, 19-24; 17:8)

Tani waxa ay mindhaa muujinaysaa, in Ciise si buuxda u yahay Ilaah, laakiin uu ka go'an yahay, oo ay ku dhan tahay caddayntii shaqsi ahaan iyo tan jiritaankiisa abadiyanka ah ee Ilaahnimo.

Haddii aad eegto sharraxa uu faaf reebay John Raymond E. Brown, *The Jerome Biblical Commentary*, waxaa ku jira tilmaan aad u qiimo badan. Waxa uu odhanayaa: "Tilmaanta hoos jooge nimada ee halkan kama saaraysa oo kama dhigayso in Ciise ereyadiisii ama hadalkiisii uu la xidhiidho oo qura dabecaddii aadanenimo ee uu lahaa. . . haddii ay sidaas tahay waxaa sidoo kale la wayn lahaa tilmaanta hagaagsan ee Cilmiga Barashada Masiixa ee Yooxanaa. Taas beddelkeedase Ciise waxa uu ku adkaysanayaa is waafaqsanaanta wax-qabadka ka dhexeeya Aabbaha iyo Wiilka, kaasoo, dabcan, si qoto dheer u dalbanaysa aqoonsiga waxa dabiiciga ah; isla qaabkan waxaa lagu isticmaalay 16:12ff. taasoo Ruuxa Qudduuska ah ku xidhaysa Wiilka. Laakiin Injiilkan oo dhan dhexdiisa marna kama helaynno iyadoo saddexmidnimada oo qaadanayo sidii aragti ah fiqi dahsoon ama aan la arki karaynin; waxaa had iyo jeer la eegayaa booska xidhiidhkeeda SOTERIOLOGY"(Bogga 434).

▣ **“wuxuu arko Aabbahoo samaynaya mooyaane”** Aadanuhu weligood maysan arag Aabbaha (cf. aayadda. 1:18), laakiin Wiilku waxa uu ku adkaysanayaa in uu aqoon iyo cilmi dheeraad ah uu u leeyahay Isaga (cf. 1:1-3).

▣ **“Wax kastoo isagu sameeyo ayaa Wiilkuna sidiisa u sameeyaa”** Marka aad eegto sida ku jirtay ficilladi iyo waxbariyadii Ciise Masiix ee aadanuhu in ay si cad u arkaan Ilaaha aan la arki karin (cf. Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:3).

5:20 “Waayo, Aabbuhu Wiilkuu jecel yahay, oo wuxuu tusaa wuxuu isagu sameeyo oo dhan” Kuwan labadooduba waa fal taagan oo toosan oo wax tilmaamaya oo ka hadlaya ficil socda. Kani waa ereyga Giriigga ah oo e taagan jacaylka, waana *phileo*. Waxaa dhacda in midi uu rajayn laha *agapeo* sida ku jirta 3:35. Labadan erey ee jacaylku waxay lahaayeen macne isku mid ah oo is daboolaya xagga Koine Greek (eeg D. A. Carson, *Exegetical Fallacies*, 2nd ed., bogagga 32-33 iyo F.F. Bruce, *Answers to Questions*, bogga. 73).

▣ **“shuqullo kuwan ka waaweyn”** Macne ahaan tani waxa ay la xidhiidhaa sare kicinta kuwii dhintay (aayadaha. 21, 25-26) iyo ku xukumidda ciqaabta (aayadaha 22, 27).

▣ **“inaad la yaabtaan”** Tani waa weedh ujeedo ka hadlaysa oo si cad u muuinaysa in ujeeddada mucjisooyinka oo ah in (ereyga jamaca ah ee idinka) waa Yuhuuddee ay rumayaan Wiilka xagga Ilaah ka yimid (cf. aayadda. 23; Falimaha Rasuullada 13: 41 [Xabaquuq 1:5]).

▣ **“Sida Aabbuhu kuwa dhintay u kiciyo. . .ayuu Wiilkuna sidaas oo kale”** Axdigii Hore dhexdiisa YHWH oo qura ayaa ahaa kan nolol bixin kara (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:39). Dhacdadii Ciise masix ku sare kiciyey kuwii dhintay waxa ay la mid tahay tii YHWH oo kale (cf. aayadda. 27).

Ciise Masiix imminkadan ayuu nolosha weligeed ah bixiyaa (cf. II Korintos 5:17; Kolosay 1:13) oo la xidhiidha muqaalka nolosha jidh ahaaneed ee facan cusub sida ku jirta aayadda. 26 (cf. I Tesaloniika 4:13-18). Yooxanaa la kulankiisii balaadhaa ee uu Masiixa la lahaa ee shaqsi ahaaneed ayaa waxa ay ahayd mid aasaas ah, halka ay welibaq ka keenayso dhacdo mustaqbalka ah oo isku xidhan (ciqaabta iyo badbaadada labadaba).

▣ **“Wiilkuna sidaas oo kale u nooleeyaa kuwuu doonayo”** Kuwee ayuu Wiilki dooranayaa in uu nolol siiyo? Sida macnaha guud uu yahay xeerka Calvinism-ku maq caddaynayo qoraal ahaan, hase ahaatee, macnaha rasmiga ah ee meesha ku jira ayaa waxa uu yahay in Ciise Masiix uu nolosha bixiyo (cf. 1:12; 3:16). Xiisaddu waxa ay ka imanaysaa 6:44, 65. Ruuxa Qudduuska ahu ma wuxuu doortaa “dadka oo dhan” mise “qaar ka mid ah”? Bal ka fakar waa wax iska cad in aadanahan dhacay ayan bilaabi karin hawsha shaqada Ruuxa Qudduuska ah, laakiin waxaan anigu si bayabal ahaaneed ugu taaganahay in dhab ah looga rabo in ay jawaab ficil ahaaneed bixiyaan (oo ay sii wadaan jawaabtaas ficil ahaaneed) si markaas uu Ruuxa Qudduuska ahu ugu dhiirri geliyo tawbadkeenka, rumaysadka, addeecista, iyo kal adayg! Yaabka runtaahu wuxuu yahay in qaar inta ay Injiilka maqlaan ay haddana yidhaadaan “Maya”! Taas waxa aan ugu yeeraa “Yaabka rumaysad darrada.” Runtu waxa ay ku jirtaa labadaba “Dembiga aan culayskiisa la iska rogi karin ” ee ay injiilladu sheegayaan iyo “iyo debiga oo dhimasho isu beddela” sida ay warqadda I Yooxanaa sheegayso. Ka Eeg Mawduuc gaar ah: I Yooxanaa 5:16.

MAWDUUC GAAR AH: EXEGETICAL PROCETURES FOR INTERPRETING “DEMBIGA AAN CULAYSKIISA LA ISKA ROGI KARIN”

- A. Xusuusnow in Injiilladu ay qaabkii ay Yuhuuddu ahaayeen uga hummaag celinayaan, labo hab
 - 1. Labo nooc oo dembiyo ah (cf. Laawiyiintii 4:2,22,27; 5:15,17-19; Tirintii 15:27-31; Sharciga Ku Noqoshadiisa 1:43; 17:12-13)
 - a. Mid aan qasad ahayn
 - b. Mid qasad ah
 - 2. Yuhuud uu habkoodu raacsan yahay Pentecoste –ga (i.e., oofinta injiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah weli lama caddayn)
- B. Ogsoonow macnaha guud ee qoraalka ku jira Markos 3:22-30
 - 1. Rumaysad darradii qoyskii uu Ciise Masiix qudhiisu ka dhashay (cf. 3:31-32)
 - 2. Rumaysad darradii Kuwii aan Yuhuudda ahayn (cf. 2:24; 3:1,6,22)
- C. Is barbar dhig ku samee halka magaca “Wiilka aadanuhu” uu isu beddelayo “wiilasha aadanaha”
 - 1. Matayos 12:22-37 (i.e., 12:32, “erey ka soo hor jeeda Wiilka Aadanaha”)
 - 2. Luukos 11:14-26; 12:8:-12 (i.e., 12:10, “erey ka soo hor jeeda Wiilka Aadanaha”)
 - 3. Markos 3:28 (i.e., “Bini aadmiga waa loo cafivi doonaa dembivadii oo dhan”)

5:22 Diidmada xooggan ee labada ah iyo ereyga falkiisu ebyamay waxa ay muujinayaan in xukun oo dhan loogu imanayo Wiilka (cf. 5:27; 9:39, Falimaha Rasuullada 10:42; 17:31; II Timoteyos 4:1; I Butros 4:5). Iska hor imaadka cad ee u dhexeeya aayaddan iyo Yooxanaa 13:17 waxa ay sharraxayaan in Ciise, markii uu ku jiray “maalmihii ugu dambeeyay, ” uusan midna xukumin, laakiin aadanuhu ay naf ahaantooda is xukumaan iyagoo Ciise Masiix ka ficiloonaya. Ciise wax xukumiddiisa maalmaha ugu dambeeya (ee kuwa aan rumaysadlka lahayn) waxaa aasaas u ah diidmadooda ay isaga diideen

Bixinta nolosha weligeed ah oo uu xukunku ka soo hor jeedo waxa ay ahayd muuqaalka ku jira 3:17-21, 36. Jacaylka Ilaah ee ku jira V Ciise Masiix, markii la diido, waxaa ka soo baxaysa cadhada Ilaah! Waxaa jira labo arrin oo qudha! Waxaa jira hal waddo oo lagu heli karo nolosha weligeed ah—waa rumaysadka Masiixa (cf. 10:1-18; 14:6; I Yooxanaa 5:9-12)!

5:23 “in dadka oo dhammu Wiilka murweeyo” Ereygan gudaha ku jidha ee “dhammu ama dhammaantood” waa muuqaal xukunka maalimta ugu dambaysa ah (cf. Filiboy 2:9-11).

☐ **“Kii aan Wiilka murwayn, ma murweeyo Aabbaha soo diray”** Hadalkani waxa uu aad ula macne yahay I Yooxanaa 5:12. Midna ma garan karo Ilaah hadduusan Wiilkiisa garan, haddii la sii fududeeyana waxa ay noqonaysaa, midna ma murweyn karo ama ma amaani karo Aabbaha kaasoo aan murweyn oo aammaanin Wiilka!

NASB (UPDATED) TEXT: 5:24-29

²⁴Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii hadalkayga maqla oo rumaysta kii i soo diray, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, xukunna geli maayo, laakiin dhimashadii ayuu ka soo gudbay oo nolosha u soo gudbay. ²⁵Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Saacaddu waa imanaysaa, waana joogtaa, markii kuwii dhintay codkii Wiilka Ilaah ay maqli doonaan, oo kuwa maqlaana way noolaan doonaan. ²⁶Sida Aabbuhu nolol isugu leeyahay, sidaasuu Wiilka u siiyey inuu nolol isugu lahaado. ²⁷Wuxuuna siiyey amar uu wax ku xukumo, maxaa yeelay, waa Wiilka Aadanaha. ²⁸Taas ha la yaabina, waayo, saacaddu waa imanaysaa markii kuwa xabaalaha ku jiraa dhammaantood ay codkiisa maqli doonaan, ²⁹wayna ka soo bixi doonaan, kuwa wanaagga falay ilaa sarakicidda nolosha, kuwa sharka falayna ilaa sarakicidda xukunka.

5:24 “Runtii, runtii” Yooxanaa labo ka dhigiddiisa aan lala wadaagin ee (aayadda. 24) oo ah ereyadii Ciise Masiix waa arar si gaar ah muhiim ugu ah hadal macne weyn leh. Mawduuc Gaar ah ka Eeg 1:51.

▣ **“Kii hadalkayga maqla oo rumaysta kii i soo diray, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah”** Halkan waxaa ah saddex erey oo fal taagan oo toosan ah. Waa caddayn iyo adkayn ku aaddan rumaynta (Mawduuc Gaar ah ka Eeg 2:23) Aabbaha oo lagu rumaysanayo Wiilka (cf. I Yooxanaa 5:9-12). Sida ku jirta qoraalladii Synoptic-ga, nolosha weligeed ah badankeed waa wax mustaqbalka imanaya oo rumaysad lagu rajaynayo, laakiin sida Yooxanaa ku jirta sida dhacdadu tahay waaa run haatan taagan (i.e., 8:51; 11:25). Waa macquul in ereyga “maqla” uu dib uga hummaag celinayo ereyga Cibraaniga *shema*, oo loola jeeday “in la maqlo si loo addeeco” (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 6:4).

▣ **“kii i soo diray”** Ereyga fal sameeyaha ah ee *apostello* (AORIST fal toosan oo fal tegay oo saddexaad ah) waa xidid ka yimid ereyga “rasuul ama kii la soo diray” (cf. aayadaha 36-37). Sharcigii Yuhuuddu wuxu u isticmaali jiray “wakiil si qaran ahaaneed loogu soo diro qorshe la isku waafaqay.” Ereygan waxaa had iyo jeer Yooxanaa dhexdiisa loogu adeegsanayaa Aabbaha oo Wiilkiisa u soo diray in uu yahay wakiilkiisa. Ka eeg tusmada 4:34.

MAWDUUC GAAR AH: DIRISTA (APOSTELLO)

Kani waa erey uu si guud ahaaneed Giriiggu ugu adeegsado diris” (i.e., *apostello*) Ereygani waxa uu leeyahay faa’idooyin dhowr ah oo fiqi ahaaneed.

1. kuwii sharciga Yuhuuddu waxa ay u adeegsan jireen midloo yeeray oo loo diray in uu si qaran ahaaneed wakiil uga yahay mid kale, si mararka qaar la mid ah halka aannu luuqaddeenna Soomaaliga ka nidhaa “Dan-jire” (cf. II Korintos 5:20)
2. Injiilladu waxa ay mar kasta ereygan u adeegsadaan in kan Aabbuhu soo diray uu yahay Ciise Masiix. Sida ku jirta Yooxanaa ereygan waxa uu sidaa rar aad u weyn (cf. Matayos 10:40; 15:24; 17:3,8,18,21,23,25; 20:21). Waxaa loo adeegsanayaa Ciise Masiix oo diraya rumaystayaasha (cf. Yooxanaa 17:18; 20:21)
3. Axdiga Cusub wuxuu u adeegsaday xertii
 - a. Labo iyo tobankii xerta ahayd ee wareegga koowaad ku jirtay (cf. Luukos 6:13; Falimaha Rasuullada 1:21-22)
 - b. Koox gaar ah oo caawiyeyaal u ahaa rasuullada
 - (1) Barnabas (cf. Falimaha Rasuullada 14:4,14)
 - (2) Andaronikos iyo Yuniyas (KJV, Junia, cf. Rooma 16:7)
 - (3) Abolloos (cf. I Korintos 4:6-9)
 - (4) Yacquub iyo Rabbiga walaalkiis (cf. Galatiya 1:19)
 - (5) Silvanus iyo Timoteyos (cf. I Tesaloniika 2:6)
 - (6) sida maangalka ah Tiitos (cf. II Korintos 8:23)
 - (7) sida maangalka ah Ebafroditos (cf. 2:25)
 - c. hadiyad joogto ah oo ka dhex socota kaniisadda (cf. I Korintos 12:28-29; Efesos 4:11)
4. Bawlos wuxuu magacan nafsad ahaantiisa u adeegsanayaa inta ugu badan warqadihiisa isagoo tilmaamaya awoodda uu isaga Ilaah ku siiyey in uu wakiil ka noqdo Ciise Masiix (cf. Rooma 1:1; I Korintos 1:1; II Korintos; galatiya 1:1; Efesos 1:1; Kolosay 1:1; I Timoteyos 1:1; II Timoteyos 1:1; Tiitos 1:1).

▣ **“laakiin dhimashadii ayuu ka soo gudbay oo nolosha u soo gudbay”** Kani waa fal tegay oo toosan oo wax tilmaamaya, oo sheegaya wax la soo dhaafay haddana booskoodii loo taagan yahay. Boqortooyada Ilaah waa joogtaa, waliba waa mustaqbal, o waa mid weligeed ah (cf. aayadaha 1:25-26; I Yooxanaa 3:14). Aayadda 25-aad waxa ay si xooggan uga sheekaynaysaa joogista ay Boqortooyada Ilaah ay hadda joogto!

5:25 “Saacaddu waa imanaysaa” Tani waa nooca luuqad ahaaneed ee uu Yooxanaa isugu beego qpraalladiisa. Ereyada iyo weedhuhu waxay labaduba sidaan labo dareen. Sida ku jirta dhacdadan “saacad” macnaheedu waa

1. saacad badbaado
2. saacad xukun

waqtigan dhisnaantiisu waa labadaba mid taagan iyo mid soo socda (cf. aayadda 29; 6:39, 44, 54). Waxa uu midi u sameeyo Ciise masiix awgii waqtigan la joogo ayuu waxa uu mustaqbalka noqonayo ku rumaysan doonaa, ha

noqdo lab amq dheddig. Badbaadada iyo xukunku waa kuwo run ahaantii taagan hadda iyo dambaysada (cf. aayadda. 28).

MAWDUUC GAAR AH: SAACADDA

Ereyga “saacad” siyaabo kala duwan ayaa loogu isticmaalaa Injiillada, sida

1. waqti tixraac ah (cf. Matayos 8:13; Luukos 7:21; Yooxanaa 11:9)
2. tilmaal ku saabsan waqtiga tijaabada iyo xukunka (cf. Matayos 10:19; Markos 13:11; Luukos 12:12)
3. rtilmaan ku saabsan waqtigii uu Ciise Masiix bilaabi lahaa adeeggiisa (cf. Yooxanaa 2:4; 4:23)
4. tilmaan ku saabsan maalinta xukunka (i.e., Imaanshada Labaad, cf. Matayos 24:36,44; 25:13; Markos 13:32; Yooxanaa 5:25,28)
5. tilmaan ku saabsan qiiradii Ciise Masiixa (cf. Matayos 26:45; Markos 14:35,41; Yooxanaa 7:30; 8:20; 12:23,27; 13:1; 16:32; 17:1)

▣ **“markii kuwii dhintay codkii Wiilka Ilaah ay maqli doonaan”** Aayadda 25 waxa ay ka hadlaysaa dhimashada ruux ahaaneed; aayadda. 29 waxa ay ka hadlaysaa sare kicidda dhammaan kuwa jidh ahaan u dhintay. Kitaabka Qudduuska ahi waxa uu ka hadlayaa saddex nooc oo ah dhimasho.

1. Dhamasho ruux ahaaneed (Bilowgii 3)
2. Dhimasho jidh ahaaneed (Bilowgii 5)
3. Dhiamsho weligeed ah (cf. Efesos 2:2; Muujintii 2:11; 2:11; 20:6, 14) ama balliga dabka ah, cadaabta (*Gehenna*).

Tani waa adeegsi aad dhif u ah oo ku saabsan weedha “Wiilka Ilaah.” Ka Eeg Mawduuc Gaar ah I Yooxanaa 3:8. Hal sabab oo aan had iyo jeer loo adeegsan weedhan waxa ay ahayd sabab ah aragtidi ay Giriigtu diin ahaan ka qabeen ilaahyada (Mt. Olympus) halka uu uga qaadanayo naag aadane ah ama xaas. Marka Ciise looga hadlayo in u yahay Wiilka Ilaah ma aha mid soo celinaysa ama ku saabsan galmood jidh ama waqti dhacay, laakiin waa xidhiidh dhow ama saaxiibtinimo. Waa tilmaamaha qoys ahaaneed ee Yuhuudda. Ciise waxa uu u si cad oo khaas ah ugu caddaynayey hoggaamiyeyaashii Yuhuudda ka imaanshihiisa xagga Ilaah isagoo adeegsanaya Axdigii Hore (cf. 5:21, 26).

5:26 “Sida Aabbuhu nolol isugu leeyahay, sidaasuu Wiilka u siiyey inuu nolol isugu lahaado” Tani waxa ay aasaasi ahaan tahay ereyga YHWH oo laga soo qaatay Baxniintii 3:14. Habka magacan Axdiga ee Ilaah waxa uu ka yimid ereyga naxwe ahaan falka ah e afka Cibraaniga ah *“ahaansho”* waxaa macnaheedu yahay keligii waare, keligii jiraya. Eeg Mawduuc Gaar ah: Magacyada Rabbaaniga ah 6:20.

Axdigii Hore dhexdiisa YHWH oo keliya “ayaa nolol lahaa” (I Timoteyos 1:17; 6:16) isaga uun baana nolol bixin karay (cf. Ayuub 10:12; 33:4; Sabuurrada 36:9). Ciise waxa uu u Ku andacooday in awooddiisan khaaska ah uu siiyey YHWH!

▣ **“sidaasuu Wiilka u siiyey inuu nolol isugu lahaado”** Tani waxa ay caddayn xooggan u tahay Rabbaanimada Ciise (cf. 1:4; I Yooxanaa 5:11).

5:27 Sababta uu ciise u awooday (*exousia*, waxay leedahay awood, cf. 10:18; 17:2; 19:11). In uu u xukumo si sax ah sababtoo ah wuxuu ahaa Ilaah buuxa sidoo kalena aadane buuxaa ama kaamil ah. Ma jiro halkan naxwe ahaan qodob qeexab oo ku lifaaqan jumlad odhaaheedda “Wiilka Aadanaha” (cf. Yexesqeel 2:1 iyo Sabuurrada 8:4). Isagu si buuxda ayuu inoo yaqaan (cf. Cibraaniyada 4:15); Ilaahna si fiican buu u yaqaan (cf. 1:18; 5:30).

Waxaa layaab leh macnaha qoraalkan meesha Ciise isugu “Wiilka” (cf. Aayadda. 19) [labo jeer], 20, 21, 22, 23 [labo jeer], 25, 26 taasoo aayadda 27 dhexdeeda cinwaan ay u tahay “Wiilka Aadanaha” (laakiin aanay u dhignayn naxwe ahaan qodob qeexan oo caadi ah) ayaa la isticmaalay. Arrintu si kastaba ha ahaatee, si la mid ah ayaa iyana lagu isticmaalay (1) 3:13, 14 oo ay ka soo hor jeeddo 3:16, 17, 18, 35, 36; (2) 6:27, 53oo ka soo hor jeedda 6:40; iyo (3) 8:28 oo ka soo hor jeedda 8:35, 36. Ciise isagoo isku badbaddalanaya ayaa isticmaalay labadan magac.

5:28 “Taas ha la yaabina” kani waa fal taagan oo toosan oo amar ah, kaasoo had iyo goor macnihiisu yahay in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray oo u yaab badan sidii ereyadii Ciise ee hore ee ku socday hoggaamiyeyaasha Yuhuuddu ay ahaayeen, hadalkiisa labaad aad ayuu runtii sidoo kale uga yaabin lahaa.

▣ “markii kuwa xabaalaha ku jiraa dhammaantood ay codkiisa maqli doonaan” Tani waxa ay u muuqataa mid soo celinaysa dhawaq ah imaanshada labaad ee Masiixa (cf. I Tesaloniika 4:16). Lasaros (cf. 11:43) waa tulaale mu aaddan dhacdadan. Tani ma diidayso runta ku jirta II Korintos 5:6, 8. Waxa ay tilmaamaysaa wax xukumista caalamiga ah iyo awoodda weyn ee Wiilka.

Macnaha guud ee meeshan ku jira badankii waxa uu la xidhiidhaa runta nolosha ruuxiga ah ee halkan iyo hadda. (sida ay runta u tahay wax xukumista iyo dhammaadka dunida). Laakiin weedhani waxa ay sidoo kale tilmaamaysaa waqti dhammaanaya oo mustaqbalka ah oo ku saabsan xukunka iyo dhacdada dhammaadka adduunka. Xiisaddan u dhexaysa horay iyo weli ee Boqortooyada Ilaah waxa ay dabecad ahaan ka muuqanaysaa Ciise wacdigiisii Injiillada qaas ahaan Injiilka Yooxanaa

5:29 Kitaabka Qudduuska ahu wuu ka hadlaa sarakicidda kuwa sharka leh iyo kuwa xaqa ah labadaba (cf. Daanyeel 12:2; Matayos 25:46; Falimaha Rasuullada 24:25). Cutubyada badankood waxa ay xoojinayaan oo caddaynayaan sarakicidda kuwa xaqa ah keligood (cf. Ayuub 19:23-29; Ishacyaah 26:19; Yooxanaa 6:39-40, 44, 54; 11:24-25; I Korintos 15:50-58).

Tani ma tixraacayso oo wax kama sheegayso xukun ku salaysan shaqooyin, laakiin xukun uu aasaaskiisu yahay hab nololeedka rumaystayaasha (cf. Matayos 25:31-46; Galatiya 5:16-21). Waxaa jira amar guud oo ku aaddan Ilaah Ereygiisa iyo adduunkiisa, aadanuhu waxa ay beertaan ayey goostaan (cf. Maahmaahyadii 11:24-25; Galatiya 6:6). Ama in meeshan la geliyo xigasho Axdigii Hore ah, “Ilaah wuxuu mud kasta ugu abaal gudi doonaa sida camalkiisu yahay” (cf. Sabuurada 62:12; 28:4; Ayuub 34:15; Maahmaahyadii 24:12; Matayos 16:27; Rooma 2:6-8; I Korintos 3:8; II Korintos 5:10; Efesos 6:8 iyo Kolosay 3:25).

NASB (UPDATED) TEXT: 5:30

³⁰Waxba keli ahaantayda ma samayn karo. Sidaan wax u maqlo ayaan u xukumaa, xukunkayguna waa xaq, waayo, doonistayda ma doono. waxaanse doonaa doonista kii i soo diray.

5:30 Ciise, oo ah Ereyga Ilaah wuxuu ahaa mid u taagan oo isaga isu dhiibay. Isu dhiibiddan xoogga lihi waxa ay ka muuqataa aayadda. 19 (“Wiilku keli ahaantiis waxba ma samayn karo”). Tani macnaheedu ma aha inuu hooseeyo, laakiin saddexmidnimada ayaa sheegaysa in uu ahaa wafuud loo soo diray arrinta madaxfurashada eek u dhex jirta saddexda shaqsi, Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa.

NASB (UPDATED) TEXT: 5:31-47

³¹Haddaan isu marag furo, maraggaygu run ma aha. ³²laakiin waxaa jira mid kale oo ii marag fura, waanan ogahay maraggu ii furaa inuu run yahay. ³³Waxaad cid u soo dirteen Yooxanaa, wuuna u marag furay runta. ³⁴Aniguse xagga dadka marag kama aan qaato, laakiin waxyaalahan waxaan u idhaahdaa inaad badbaaddaan. ³⁵Isagu wuxuu ahaa laambad baxaysa oo ifaysa, idinkuna waxaad doonayseen inaad saacad ku faraxdaan nuurkiisa. ³⁶laakiin maraggaan leeyahay waa ka weyn yahay kii Yooxanaa, waayo, shuqullada Aabbuhu i siiyey inaan dhammeeyo waa kuwaan hadda samaynayo, wayna ii marag furayaan in Aabbuhu i soo diray. ³⁷Aabbihii i soo dirayna waa ii marag furay. Idinkuna codkiisa ma maqlin goornaba, mana aydnaan arkin muuqiisa. ³⁸Mana haysataan hadalkiisa oo idinku sii jira waayo, kii uu soo diray waad rumaysan weydeen. ³⁹Qorniinka ayaad baadhaan, waayo, waxaad u malaynaysaan inaad nolosha weligeed ah ka helaysaan, waana iyaga kuwa ii marag furayaa. ⁴⁰Idinkuna dooni maysaan inaad ii timaadaan inaad nolol lahaataan. ⁴¹Anigu dadka ammaan kama qaato. ⁴²laakiin waan idin aqaan inaan jacaylka Ilaah idinku jirin. ⁴³Waxaan ku imid Aabbahay magiciis, idinkuna waad i aqbali weydeen. Haddiise mid kale magiciisa ku yimaado. kaasaad aqbalaysaan. ⁴⁴Sidee baad u rumaysan kartaan, idinkoo dhexdiinna ammaan iska aqbalaya. oo aydnaan doonayn amaanta ka timaada Ilaaha keligiis ah? ⁴⁵Ha u malaynina inaan Aabbaha idinku ashtakaynayo; kan idin ashtakaynayaa waa Muuse, kii aad isku hallayseen. ⁴⁶Waayo haddaad Muuse rumaysateen, anigana waad i rumaysan lahaydeen, waayo, wax buu iga qoray. ⁴⁷laakiin haddaydnaan rumaysan wuxuu qoray. sidee baad u rumaysan doontaan hadalladayda?

5:31 Axdigii Hore dhexdiisa waxaa loo baahnaa labo marqaati marka wax la caddaynayo (cf. Tirintii 35:30; Sharciga Ku Noqoshadiisa 19:15). Sida macnahan guud ku jirta shan marqaati ayuu naftiisa ku bixinayaa.

1. Aabbaha (aayadaha. 32, 37)
 2. Yooxanaa Baabtiisaha (aayadda. 33, cf. 1:19-51)
 3. Ciise shaqooyinkiisii gaarka ahaa (cf. aayadda. 36)
 4. Qorniinka (cf. aayadda. 39)
 5. Muuse (cf. aayadda. 46) taasoo muujinaysa Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15-22
- Ka Eeg Mawduuc Gaar ah: 1:8

▣ **“haddii”** Kani waa fal heerka saddexaad oo shuruud ah, oo ka hadlaya ficil wax ku ool ah.

▣ **“maraggaygu run ma aha”** Tani waxa ay u muuqataa in ay ka soo hor jeeddo 8:14. Macnaha guud waxa uu muujinayaa in hadalladan loo sameeyay labo hab oo kala duwan. Halkan Ciise waxa uu ku muujinayaa in ay jiraan kuwo kale oo u marqaati furaya, laakiin 8:14 waxa uu ku muujinayaa in tiisa oo qura ay tahay lagama maarmaanka!

Sida ay “runta” u tahay Ka Eeg Mawduuc gaar ah: Runta ku jirta Yooxanaa 6:55.

5:32 “laakiin waxaa jira mid kale oo ii marag fura” Tani waxa ay la xidhiidhaa Ilaaha ah aabbaha (cf. I Yooxanaa 5:9) macnaha adeegsiga ereyga *allos*, taasoo macnaheedu yahay, “mid kale oo isla sidii ah” oo ku kala dhan ah *hetros*, oo macnaheedu yahay “mid ka duwan kii kale,” in kastoo qiyaastani ay ku dhex qarsoontay qoraalkii Giriigga ee Koine. Ka Eeg Mawduuc Gaar ah: U marqaati kicidda Ciise 1:8.

5:33 “Waxaad cid u soo dirteen Yooxanaa” Tani waxa ay la xidhiidhaa Yooxanaa Baabtiisaha (cf. 1:19).

5:34 “waxyaalahan waxaan u idhaahdaa inaad badbaaddaan” Kani waa hadal aan toosnayn. Hadalka aan tooska ahayn waxa uu tilmaamayaa wakiilka Ilaah ama Ruuxa (cf. 6:44, 65). Xusuusnow Injiilladu waa wacdiyo faafin ah (i.e., kutubbo), mase aha qoraallo taariikh nololeed. Waxaa jira ujeedooyin gaadhsiinta ah oo dhammaantood la kaydiyey (cf. 20:30-31).

5:35 “Isagu wuxuu ahaa laambad” Tani waa caddayn kale oo ku saabsan iftiinka, Tani waxa ay ahayd Yooxanaa farriintiisii is diyaarinta (cf. 1:6-8).

5:36 “uwaan hadda samaynayo, wayna ii marag furayaan” Ciise falimihiisu waxa ay ahaayeen oofiinnadii wixii ay nebiyadu kaga sii sheegeen Masiixa Axdigii Hore dhexdiisa. Yuhuuddii xilligiisa joogtay way aqbaleen calaamadihii mucjiseda badnaa—bogsintii kuwa, quudintii kuwii saboolka ahaa, lugo-u-soo celintii kii cuuryaanka ahaa (cf. Ishacyaah 29:18; 32:3-4; 35:5-6; 42:7). Awoodii Ciise wax-baridyadiisii, xaqnimadii hab nololeedkiisii, naxariistiisii, iyo mucjisoooyinkiisii aadka u xoogga badnaa (cf. 2:23; 6:9-10; 29:13; Yeremyaah 5:21) waxa ay dhammaan muujinayaan kii uu isagu ahaa, halkii uu ka yimid, iyo Kii isaga soo diray.

5:37 “waa ii marag furay” Ereygan “Isaga” waxa uu u taagan yahay Aabbaha. Sida uu macnaha guud tilmaamayo waxa ay weedhani u muuqataa in uu tix raacayo Qorniinka Axdigii Hore (cf. Cibraaniyada 1:1-3). Tani waxa ay tixraac u tahay dhammaan tixraacyadii ku saabsanaa Masiixa ee Axdigii Hore (cf. aayadda. 39).

▣ **“Idinkuna codkiisa ma maqlin goornaba, mana aydnaan arkin muuqiisa.”** Ciise waxa uu halkan ku tilmaamayaa in Yuhuuddu inkastoo ay garanyeen Ilaah xagga Qorniinka oo ay khibrad shaqi ahaaneed ugu lahaayeen xagga caabidaadda, iyagu gebi ahaanba si dhab ah uma aysan aqoon Isaga (cf. 8:43; Ishacyaah 1:1-15; 6:9-10; 29:13; Yeremyaah 5:21).

Axdigii Hore dhexdiisa, in la arko Ilaah waxa ay ahayd fikir keenaya dhimasho. Qofka keliya ee sida tooska ah YHWH fool ka fool ula hadlay waxa uu ahaa Muuse la socoshaduna waxa ay ahayd daruurtii u ku dhex jiray ama ku daboolaa. Kuwa badan waxa ay ku fakareen in Baxniintii 33:23 ay ka soo hor jeeddo ama burrinayso Yooxanaa 1:18. Si kasta ha ahaatee, ereyga Cibraaniga ee ku jira Baxniintii macnihiisu waa “ammaanta kaddib,” ma aha muuqaal jidh ahaaneed.

5:38 “hadalkiisa oo idinku sii jira” Kuwa waa tilmaamo awood badan oo ku jira Yooxanaa qoraalladiisa. Ereyga Ilaah (*logos*) waa in la qaataa, markii la qaatana (cf. 1:27) waa in lagu joogaa isaga (ku jira, cf. Yooxanaa 8:31; 15:4, 5, 6, 7, 10’ I Yooxanaa 2:6, 10, 14, 17, 28; 3:6, 14, 15, 24). Ciise waa muujinta Ilaah oo kaanil ah (cf. Yooxanaa 1:1-18; Filiboy 2:6-11; Kolosay 1:15-17; Cibraaniyada 1:1-3). Badbaadada waxaa lagu saleeyey in ay tahay xidhiidh soconaya oo aan joogsi lahayn (habka ereyga Cibraaniga ee “ogaansho” ama garasho cf. Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5) iyo adkaanta runta Injiilka ku jirta (habka ereyga Giriigga ee “ogaansho” ama garasho cf. II Yooxanaa 9).

Ereygan “ku jiris” macnaha xidhiidh ku dhow oo shaqsi ahaaneed oo ku adkaansho la socdo. Ku jiristu waa xaaladda badbaado ee runta eh (cf. cutubka 15) macnayaal dhowr ah ayaa loo adeegsaday Yooxanaa dhexdiisa.

1. Wiilka oo ku jira Aabbaha (cf. 10:38; 14:10, 11, 20, 21; 17:21)
2. Aabbaha oo ku jira Wiilka (cf. 10:38; 14:10, 11, 21; 17:21, 23)
3. Rumaystayaasha oo ku jira Wiilka (cf. 10:56; 14:20, 21; 15:5; 17:21)
4. Rumaystayaasha oo ku jira Wiilka iyo Aabbaha (cf. 14:23)
5. Rumaystayaasha oo ku jira ereyga (cf. 5:38; 8:31; 15:7; I Yooxanaa 2:14).

Ka Eeg Mawduuc Gaar ah: I Yooxanaa 2:10.

5:39 “Qorniinka ayaad baadhaan” Tani waxa ay noqon kartaa fal taagan oo toosan, ama fal taagan oo toosan oo amar ah. Maaddaama ay marqaatifurro taxan oo ah in Yuhuuddu ay diideen ugu dhawaan markaa waa MID WAX MUUJINAYA.

Halkan waxaa ah masiibadii hoggaamiyeyaashii Yuhuudda: Qorniinnada ayey haysteen, way aqriyeen, barteen, dusha ka xafideen, haddana waxa ay garan waaween kii ay Qorniinnadu tilmaamayeen! Ruuxa la’aantii qoraalladu wax saamayn ah ma yeeshaan! Noloshu runta ahi waxa ay ku timaaddaa oo qura xidhiidh rumaysad shaqsi ahaaneed oo addeecis leh (i.e., Sharciga Ku Noqoshadiisa 4:1; 8:13; 30:15-20; 32:46-47).

▣ **“waana iyaga kuwa ii marag furayaa”** Tani waxa ay la xidhiidhaa Qorniinnadii Axdigii Hore, oo ah kuwa uu Ciise Masiix oofinayo ama dhammaystirayo (i.e., 1:45; 2:22; 5:46; 12:16, 41; 19:28; 20:9). Muxaadaroooyinkii ugu horreeyay ee Butros badankood (cf. Falimaha Rasuullada 3:18; 10:43) iyo Bawlos (cf. Falimaha rasuullada 13:27; 17:2-3; 26:22-23, 27) sida ku jira falimaha waxa ay kaamileen wax sii sheegidda caddaynta u ah Ciise Masiix ahaantiis. Dhammaantood laakiin hal tuduc (I Butros 3:15-16), oo xoojinaysa Awoodda xukunka Qorniinka ee laga helay Axdiga Cusub (cf. I Korintos 2:9-13; I Tesaloniika 2:13; II Timoteyos 3:16; I Butros 1:23-25; II Butros 1:20-21), waxa ay tix raacayaan Axdigii Hore. Ciise waxa uu si cad naf anaahitiisay ugu arkay in uu yahay oofinta iyo yoolka (iyo tafiiraha gaarka ah, cf. Matayos 5:17-48) ee Axdigii Hore.

MAWDUUC GAAR AH: WACDINTII KANIISADDII UGU HORRAYSAY

- A. Ballammadii Ilaah ku sameeyay Axdigii Hore dhexdiisa ayaa hadda lagu oofiyey ama lagu kaamil yeelay inmaatinka Ciise oo ah Masiixa (Falimaha Rasuullada 2:30; 3:19,24; 10:43; 26:6-7,22; Rooma 1:2-4; I Timoteyos 3:16; Cibraaniyada 1:1-2; I Butros 1:10-12; II Butros 1:18-19).
- B. Ciise Ilaah qudhiisa ayaa u subkay in uu yahay Masiix xilligii Baabtiiska (Falimaha Rasuullada 10:38).
- C. Ciise Galiili ayuu adeeggiisii Rabbiga ka bilaabay markii la baabtiisay kaddib (Falimaha Rasuullada 10:37).
- D. Adeeggiisii waxaa looga bartay dabecad ahaan samaynta wanaagga iyo fulinta shaqooyin waaweyn oo calculus isagoo awoodda Ilaah ku samaynta (Markos 10:45; Falimaha Rasuullada 2:22; 10:38).
- E. Waxaa Masiixa iskutallaabta loogu qodbay Ilaah ujeedkiisii noloshu weligeed ah darteed (Markos 10:45; Yooxanaa 3:16; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:13-15,18; 4:11; 10:39; 26:23; Rooma 8:34; I Korintos 1:17-18; 15:3 Galatiya 1:4; cibraaniyada 1:3; I Butros 1:2,19; 3:18; I Yooxanaa 4:10).
- F. Dhimashadii ayaa laga soo sarakiciyey oo xertiisii ayuu u muuqday (Falimaha Rasuullada 2:24,31-32; 3:15,26; 10:40-41; 17:31; 26:23; Rooma 8:34; 10:9; I Korintos 15:4-7, 12ff; I Tesaloniika 1:10; I Timoteyos 3:16; I Butros 1:2; 3:18,21).
- G. Ciise Ilaah ayaa ammaanay oo siiyey magaca “Rabbi” ama “Sayid” (Falimaha Rasuullada 2:25-29, 33-36; 3:13; 10:36; Rooma 8:34; 10:9; I Timoteyos 3:16; Cibraaniyada 1:3; I Butros 3:22).
- H. Ruuxa Qudduuska ah ayuu siiyey si u hagaajiyo bulshada Ilaah (Falimaha Rasuullada 1:8; 2:14-18, 38-39; 10:44-47; I Butros 1:12).

- I. Wuxuu mar kale u iman doonaa xukunka iyo dib u soo celinta wax kasta (Falimaha Rasuullada 3:20-22; 10:42; 17:31; I Korintos 15:20-28; I Tesaloniika 1:10).
- J. Oo kuwii farriinta maqla oo dhan way tawbad keeni doonaan oo waa la baabtiisi doonaa (Falimaha Rasuullada 2:21,38; 3:19; 43,47-48; 17:30; 26:20; Rooma 1:17; 10:9; I Butros 3:21).

Qorshahani waxa uu noqday shaacinta lagama maarmaanka ah ee kaniisaddii hore, in kastoo qorayaasha Axdiga Cusub ee kala duwan ay ka tageen qayb ama ay caddeeyeen kuwo kale oo gaar ah wacdigooda dhexdiisa. Injiilka Markos dhammaantiis waxa si aad ugu dhow u raacsan yahay aragtida Butros ee *kerygma*. Markos waxaa caado ahaan loo arkaa in uu muuqaal dhismeed u yeelayo wacdiyada Butros, ee Rooma laga dhex wacdiyey, oo Injiilka qoran ah. Matayos iyo Luukos waxa ay labaduba raacsan yihiin Markos muuqaalkiisa aasaasiga ah ee Injiilkiisa ku jira.

5:41-44 Aayadahan waxa ay u muuqdaan kuwo soo celinaya dhacdadii ay hoggaamiyeyaashii diintu ugu raaxaysanayeen sacabiskii saaxiibbadooda. Way ammaaneen iyagoo ka soo xiganaya kuwoodii hore ee sharciga, laakiin indho la'aantooda ruuxiga ah waxa ay gafeen ama garan waayeen kii ugu weynaa macallimiinta oo dhan, kaasoo dhexdooda joogay. Tani waa mid ka mid ah Ciise dacwadihiisii xoogganaa qarnigii ugu horreeyay ee sharcigii Yuhuudda (sidoo kale ka eeg ogaysiiska masaalka ku jira Matayos 21:33-46; Markos 12:1-12; Luukos 20:9-19).

5:41

NASB, NRSV “Anigu dadka ammaan kama qaato”

NKJV “Anigu dadka xushmayn kama qaato”

TEV “Ma raadinayo ammaanta aadanaha”

NJB “Ammaantaadanuhu waxa macne ah iima laha aniga”

Ereyga “Ammaan,” *doxa*, way adag tahay in si tos ah loo sharaxo (Ka eeg Mawduuc Gaar ah: 1:14). Afka Cibraaniga “ammaan” waxa uu noqonayaa *kabodh*, kaaloo loo adeegsaday qaab lagu caddaynayo Ilaah ogaalkiisa weyn iyo la joogistiisa (cf. Baxniintii 16:10; 24:17’ 40:34; Falimaha Rasuullada 7:2) iyo in Ilaah dabeecaddiisa iyo falimihii lagu ammaano. Aayadda ku habboon ee labadan xigasho isk xidhaysa waa II Butros 1:17.

Aragtida maskax badnaanta Ilaah la joogistiisa iyo dabeecaddiisa waxa ay la xidhiidhaan

1. Malaa’igaha (cf. Luukos 2:9; II Butros 2:10)
2. Xukunka Ciise (cf. Yooxanaa 1:14; 8:54; 12:28; 13:31; 17:1-5, 22, 24; I Korintos 2:8; Filiboy 3:17)
3. Kaxaynta rumaystayaasha (cf. Rooma 8:18, 21; I Korintos 2:7; 15:43; II Korintos 4:17; Kolosay 3:4; I Tesaloniika 2:12; II Tesaloniika 2:10; Cibraaniyada 2:10; I Butros 5:1, 4)

Xiiso ayey sidoo kale leedahay in la ogaado in Yooxanaa uu iskutallaab ku qodbiddii Ciise uu u tix raacayo in ay tahay tii uu ku ammaanmay (cf. 7:39; 12:16, 23; 13:31). Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa sidoo kale loo tarjuman karaa “xushmo” ama “u mahad naqid” (cf. Luukos 17:18; Falimaha Rasuullada 12:23; Rooma 4:20; I Korintos 10:31; II Korintos 4:15; Filiboy 1:11; 2:11; Muujintii 11:13; 14:7; 16:9; 19:7). Tani waa sida macnahan guud loogu isticmaalay.

5:43 “idinkuna waad i aqbali weydeen” Injiilka Yooxanaa oo dhan, in diiradda la saaro rumaynta Ciise looguma qorin sidii fiqi madhab ahaaneed laakiin in si shaqsi ah la isugu tiriyo Isaga (i.e., aayadaha 39-40). Rumaysadku waxa uu ka bilowdaa in la go’aansado in Isaga la aammino. Tani waxa ay bilowdaa xidhiidh shaqsi ahaaneed oo xernimo kaasoo buuxiya qaangaadhnimada iyo u ekaanta Masiixa nolol leh.

☐ **“Haddiise mid kale magiciisa ku yimaado”** Tani waa jumlad shuruud ka hadlaysa oo heerka saddexaad ah.

☐ **“kaasaad aqbalaysaan”** Tani waa cayaadh ku aaddan qodobdadii wax barashada qodobbadeedii oo la barbar dhigayo macallimiinta kala duwanaanshahooda iskuulladii Talmud.

Michael Magill, *New Testament TransLine*, ayaa xigasho fiican inoo haya:

“Hoggaamiyeyaashii Yuhuuddu waxay heli doonaan macallin aadane ama kuwa sharcigu kuma andacoon doonaan in Ilaah soo diray. Marka macallin aadane la eego, waa xidhiidh la yaab leh oo tijaabo ah, iyagoo amaan isku mid ah is dhaafsanaya. Haddiise la eego nebi Ilaah soo diray, waxa ay lahaan lahaayeen xidhiidh boos oo

ku tiirsanaan ah, oo ah maqlid iyo adeecid. Tan ayaa sal u ahayd sababtii nebiyadii Ilaah loo diiday” (Bogga 318).

5:44 Ka eeg ogaysiiska 17:3

5:45-47 Ciise waxa uu tilmaamayaa in qoraalladii Muuse ay sii muujiyeen isaga. Tani waa sida ku jirta Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15-22. Sida ku qoran aayadda 45 Qorniinka waxaa si gaar looga dhigay in ay yihiin wax-dacweeyayaa. Tan waxaa loola jeeday oo macnaheedu ahaa hage (cf. Luukos 16:31). Hagihii la diiday, ayaa waxa uu noqonayaa cadaw (cf. Galatiya 3:8-14, 23-29).

5:46, 47 “Haddii. . .Haddii” Tani waa jumlad heerka labaad oo shuruud ah oo liigu yeedho “lid ku ahaanshaha waaqiciga, ” taasoo tilmaamaysa in hoggaamiyeyaashii Yuhuuddu aysan runtii rumaysnayn xitaa qoraalladii Muuse iyo Ciise Masiix (kan leh xukunka dhammaadka dunida ee uu Muuse sii sheegay, [i.e., nebiga, sida ku jirta Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15-19]) waxa ay ahaan lahayd xukunkooda maalinta ugu dambaysa. Ereyga “Haddii” ee ku jira aayadda. 47 waxa ay na baraysaa in ay tahay jumlad heerka koowaad oo shuruud ka hadlaysa oo ah in ay wax rumoobaan Kitaabka (NIV waxa uu odhanayaa “maaddaama ama inkastoo”).

SU’AALO FALAQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeena kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahaan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Sababtee ayey aayadda 4 ooga baxsan tahay tarjumaadaheenna casriga ah?
2. Sababtee ayuu Ciise u bogsiiyey ninkan gaarka ah?
3. Miyuu rumaysadku qayb ka ahaa ninkan bogsiintiisa? Miyey bogsiinta jidh ahaaneed tilmaamaysaa bogsiinta ruuxa?
4. Miyey jirradiisu la xidhiidhay dembigiisa shaqsi ahaaneed?
5. Sababtee ayey Yuhuuddu u rabeen in ay dilaan Ciise?
6. Tax u samee shuqullada Ilaah ee ku jira Axdigii Hore ee uu Ciise dhaqan geliyey ama sameeyay?
7. Nollosha weligeed ahi ma mid hadda taagan baa mise mid mustaqbalka ah?
8. Xukunka ugu dambeeya ma wuxuu ku xidhan yahay shaqooyin mise rumaysad? Sababtu waa middee?

YOOXANAA 6

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Quudintii Shanta Kun	Quudintii Shanta Kun	Quudintii Shanta Kun	Ciise oo Shan Kun	Mucjisadii Kibsaha
6:1-15	6:1-14	6:1-15	6:1-6 6:7 6:8-9 6:10-13 6:14-15	6:1-14 6:5-15
Ku Dul Socoshadii Biyaha	Ciise oo Biyaha Ku Dul Socda Biyaha	Ciise oo Biyaha Ku Dul Socda Biyaha	Ciise oo Biyaha Ku Dul Socda Biyaha	Ciise oo Xertiisa u Yimid Isagoo Biyaha Ku Dul Socda
6:16-21	6:15-21	6:16-21	6:16-21	6:16-21
Ciise Kibista Nolosha	Kibista Ka Timid Samada	Ciise, Kibista Nolosha	Dadku Ciise ayey doondooneen	Kala Diristii Kuwii Sunagoogga Kafarnaum joogay
6:22-33	6:22-40	6:22-24	6:22-24 Ciise Kibista Nolosha 5:24-29	6:22-27
		6:25-40	6:25 6:26-27 6:28 6:29 6:30-31 6:32-33 6:34 6:35-40	6:28-40
6:34-40				
	Kuwiisii baa diiday			
6:41-51	6:41-59	6:41-51	6:41-42	6:41-51
6:52-59		6:52-59	6:43-51 5:52 6:53-58 6:59	6:52-58 6:59-63

Ereyada Nolosha Weligeed ah	Xer Badab ayaa laabtay		Ereyada Nolosha	
6:60-65	6:60-71	6:60-65	6:60	
			6:60-65	6:64-66
6:66-71		6:66-71	6:66-67	Butros hawshiisii rumaysadka
			6:68-69	6:67-71
			6:70-71	

AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga v)

ADIGA OO RAACAYA UJEEDEKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafsiiro lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiiirka. Waa in aadan midan ula tegin qof kuu tafsiiira..

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

1. Baaragaraaf-ka koowaad
2. Baaragaraaf-ka labaad
3. Baaragaraaf-ka saddeexaad
4. IWM.

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Injiilka Yooxanaa waxba ka uu qorin cashadii sayidka laf ahaanteeda in kastoo cutubyada 13-17 ay qoreen wada sheekaysigii iyo salaaddii ka dhacday qolka sare. Ka tegitaanka noocan ah waxaa loo qaadan karaa mid ula kac ah. Kaniisaddii qarnigii labaad waxa ay bilowday in ay dib u akhrido subkidda iyadoo laga eegayo macnaha xagga caadada. Waxa u arkeen in ay tahay ililada ama waddooyinka nimcada. Waxaa laga yaabaa in Yooxanaa ka duulayey aragtida xagga caadada markii aannu qorin Ciise Baabtiiskiisii, ama cashadii Rabbiga.
- B. Yooxanaa 6 macnaha uu bixinayaa waxaa weeye quudintii la quudiyey shantii kun ee dadka ahaa. Arrintu si kastaq ha ahaatee, qaar badan ayaa waxa ay u adegsadaan aragtida caadada ee wixii laga arkay Masiixa. Tani waxaa weeyaan asalka caqiidada Kaniisadda Rooman Kaatooligga ee is beddelka dib u cusboonaysiinta. (aayadaha. 53-56)

Su'aasha haddaba sida ay xidhiidha ula leeyahay cutubka 6 Euchrast waxa ay tusaysaa labada dabeecadood ee Injiillada. Sida cad, Injiilladu waxa ay la xidhiidhaan Ciise hadal ahaan iyo nolol ahaanba, haddana waxaa la qoray tobannaan sano kaddib waxaanay qeexayaan shaqsiyaadkii qoray oo ahaa sida ay qoraayaasha bulshadoodu rumaysadka u lahaayeen. Halkan waxaa ah saddex heer ujeeddo oo ay qoraayadu lahaayeen.

1. Ruuxa Qudduuska ah
2. Ciise dhegaystayaashii ugu horreeyay
3. Qoraayaashii Injiilka iyo akhristayaashii

Sidee mid loo tarjumaa? Habka qudha ee saxda noqon kara waxaa weeya dheegashada macnaha guud, naxwe ahaan, daraasaad dheeraad ah, oo muujinaysa taxane taariikheed balse aan ahayn sidaas iyo sidaas.

- C. Waa in aan xasuusnaanaa in dhegaystayaashu ay ahaayeen Yuhuud dhaqankooduna uu ahaa mid ku salaysan filashada macallimiinta diinta ee ku wajahnayd Masiixa oo Muuse ka awood badan (cf. aaydanaha. 30-31), qaasatan marka la eego waayo aragnimadii laga helay xilligii Baxniintii, sida “manada.” Macallimiintii diintu waxa ay ahayd in au isticmaalaan Sabuurrada 72:16 marka la rabo qoraal caddayn ahaaneed. Hadalladii Ciise ee aan caadiga ahayn (cf. aayadaha. 60-62, 66) macnahoodu waxa ay ka dhignaayeen in uu ku saxo filashooyinkii qaldanaa ee ay dadkii badnaa ka haysteen Masiixii la filayey (cf. aayadaha 14-15).
- D. Aabbayaashii kaniisaddii hore iskuma ay waafaqin in curriskani uu ka hadlayo cashadii Rabbiga Cuqaashii joogtay Alagsandariya, Origen iyo Eusebius weligood kuma ay sheegin wax ka hadlaya Cashada Rabbiga wax ku saabsan falanqayntii ay ka yeeshen curriskan.
- E. Tilmaamaha cutubkan waxa ay aad ula mid yihiin ereyadii Ciise u adeegsaday “gabadii ceelka joogtay” sida ku jirta Yooxanaa Yooxanaa 4. Biyaha dhulka iyo kibirta waxaa tilmaamo ahaan loo adeegsadaa nolosha weligeed ah iyo xaqiiqooyinka ruuxiga ah.
- F. Kibistan sii badanaaya waxaa weeye mucjisada keliya eek u qoran afarta injiilba (Matayos 14:13-21; Markos 6:31-44; Luukos 9:10-17)!
- G. Michael Magill, *New Testament TransLine* (Bogga 325) waxa uu samaynayaa indhaindhayn xiise leh oo la xidhiidha kooxihii kala duwanaa ee Kafarna’oom iyo xidhiidhka ay la leeyihiin ereyadii naxdinta lahaa ee Ciise Masiix.
1. Dadkii badnaa aayadda 24
 2. Yuhuuddii aayadda 41, 52
 3. Xertii aayadaha 60-66
 4. Labo iyo tobankii , 67
- Ciise waxa uu si xoog leh
1. dadkii badnaa uga joojiyey isku daygoodii ahaa in ay isaga ka dhigaan boqor maaddaama uu iyaga quudiyey (6:15)
 2. sheegashooyinkiisii xaasaasiga ahaa ayaa waxa uu ku tiritirsiyey hoggaankii Yuhuudda
 3. waxa ay sababtay in raacayaal badan oo aan qalbigoodu daacan ahayn ay meesha ka tagaan
 4. waxa uu sheegay hadallo si qoto dheer oo is dabab joog labo iyo tobankii iimaankoodii u sii xoojiyey (6:68-69)

NASB (UPDATED) TEXT: 6:1-14

¹Waxaas dabadeed Ciise wuxuu u kacay dhinaca kale oo badda Galili oo ahayd baddii Tiberiyas. ²Dad badanna way raaceen, waayo, waxay arkeen calaamooyinkii uu ku sameeyey kuwii bukay. ³Kolkaasaa Ciise buurta u baxay, halkaasna ayuu xertiisii la fadhiistay. ⁴Markaasna waxaa dhowday Iiddii Kormaridda ee ahayd iiddii Yuhuudda. ⁵Haddaba Ciise intuu indhihiisii kor u qaaday, ayuu wuxuu arkay dad badan oo soo socda, wuxuuna Filibos ku yidhi, Xaggee baynu kibis ka soo iibinnaa inay kuwanu cunaan? ⁶ Wuxuu waxaas ugu yidhi inuu jirabo isaga, waayo, isaga qudhiisu waa ogaa wuxuu samayn lahaa. ⁷ Filibos wuxuu ugu jawaabay, Laba boqol oo dinaar oo kibis ahi kuma filla in nin walba wax yar qaato. ⁸Markaasaa xertiisii midkood oo Andaros la odhan jiray oo Simoon Butros walaalkiis ahaa wuxuu ku yidhi, ⁹Halkan waxaa jooga wiil qaba shan kibsood oo shaciir ah iyo laba kalluun, laakiin waxaasi maxay u tarayaan dad sidan u badan? ¹⁰Markaasaa Ciise yidhi, Dadka fadhiisiya. Meeshaasina waxay lahayd doog badan. Haddaba nimankii waa fadhiisteen, tiradooduna

qiyaastii waxay ahayd shan kun. ¹¹Haddaba Ciise kibistuu qaaday, oo goortuu mahad naqay ayuu u qaybiyey kuwii fadhiyey, sidaas oo kalena kalluunkii intay doonayeen. ¹² Markay wada dhergeen, wuxuu xertiisii ku yidhi, Ururiya jjabkii hadhay, waxba yaanay ka hallaabin. ¹³Sidaa aawadeed ayay ururiyeen, oo laba iyo toban dembiilood ayay ka buuxiyeen jjabkii ka hadhay kuwii shantii kibsood oo shaciirka ahayd cunay. ¹⁴Haddaba dadkii markay arkeen calaamadii UU sameeyey, waxay yidhaahdeen, Runtii, kanu waa nebigii dunida iman lahaa.”

6:1 “badda Galili oo ahayd baddii (Tiberiyas)” Biyahan meshan fadhoiya waxaa loo yaqaanay dhowr magaca oo kale. Axdigii Hore dhexdiisa waxaa loo yeedhay Kinneret, (Tirintii 34:11). Waxaa kaloo loo yaqaannay badda Gennesaret sida ku jirta Luukos 5:1 magaca Roomaaniyiintu u yaqaanneena waxa uu ahaa Tiberiyas sida ku qoran Yooxanaa 21:1 Tani waa faallo kale oo uu qoraagu ku kordhiyey. Waxa ay tusaysaa in Injiilka Yooxanaa loogu talo galay dadkii ka baxsanaa dhulkii Falastiin (cf. aayadaha. 6:4, 64, 71).

6:2 ogaysii ku saabsan sababtii dadka badan ay u raaceen.

6:3 Si uu u muujiyo muhiimadda meesha ku jirta ayaa Ciise u isticmaalay biyahan iyo buurtan dabiiciga ah. Run ahaan, in uu dadka “fadhiisiiyey” waxa ay muujinaysaa in ay taasi ahayd wax barid rasmi ah oo xertiisuna ka qayb ahayd. Arrin la ayaab leh aya waxa ay tahay in buurtu ay ka dhigan tahay xusuusin calaamadihii Muuse sida Matayos 5-7.

Kulankan wax barista ah ee ballaadhan Ciise waxa uu ugu qudbadeeyay kooxo kala duwan oo ka mid ahaa dadkii meesha joogay. Kuwii ku wareegsanaa caghiisa ama ugu dhawaawaxa ay ahaayeen xertiisa; kuwa ku xigana waxa ay ahaayeen kuwii dhiiranaa, oo ay ku sii xigaan tujaartii iyo dadkii caadiga ahaa “dadkii dhulka lahaa”; iyo, kooxo yar, hoggaamiyeyaashii diinta (Faarisiintii, wadaaddadii sare ee diinta, sudukiintii iyo suurtoagal ahaan xataa Isiyaaniska).

6:4 “Iiddii Kormaridda ee ahayd iiddii Yuhuudda” Jidka keliya ee lagu ogaan karayey qotada shaqadii Ciise Masiix waxa ay ahayd Iiddii Kormaridda sida lagu sheegay Injiilka Yooxanaa (ugu horrayn 2:13; mar labaad, 6:4; iyo mar saddexaad, 11:55 & 13:1). Haddii Yooxanaa 5:1 uu sidoo kale ka hadlayo Iidda Kormaridda waxa aynu ogaanaynaa in dhererka muddadii shaqadii Ciise ay socotay ay noqonayso uun saddex sano iyo badh. Waxaa jira waxyaabo badan oo aynaan ka ogayn noloshu Ciise (aayadaha. 20:30; 21:25).

6:6 “Wuxuu waxaas ugu yidhi inuu jirraab isaga” Halkan ereyga Giriigga ee “tijaabo” (*pierazo*) waxa uu badanaa xambaarsan yahay xidhiidh shar ah (Ka Eeg Mawduuc Gaar ah I Yooxanaa 4:1, cf. Matayos 4:1). Kani waa tusaale fiican oo muujinaya in tuarjumaannada casriga ahi ay isku dayaan in hadalka ku qoran Axdiga cusub ay si qasab ah u le’ekaysiiyaan hal qeexitaan. Afka Giriigga Koine waxa uu si isa soo taraysa I luminayey naxwe luuqadeed badan oo laga sooci lahaa afkii Giriigga ee waayadan dambe (cf. ka eeg 5:20).

Ciise waxa uu tijaabinayey laakiin sidee?

1. Iimaankiisa uu ku qabo in uu yahay ka wax quudiya?
2. Aqoontiisa Axdiga Hore (cf. Tirintii 11:13, oo ku saabsan su’aashii Muuse ee ah in Ilaah yahay kan wax quudiya)?
3. Sida uu u danaynayo ee uu uga fikirayo dadkii badnaa ee meesha ku soo ururay.

6:7

NASB, NJKV, JB

“laba boqol oo dinar la qiimo ah”

NRSV

“u dhigma lix bilood oo mushaar ah”

TEV

“Labo bqol oo ah shilimmo qalin ah”

Dinaad wuxuu la mid ahaa mushaarka shaqaale ku shaqeeyo maalin (Matayos 20:2) iyo askari. Tani macnaheedu wuxuu la dhignaa saddex dalool labo dalool oo ah mushaar ha sano.

MAWDUUC GAAR AH: LACAGTII SHILIMAADKA AHAYD EE FALASTIIN LAGA ISTICMAALI JIRAY XILLIGII CIISE

- I. Shilimmada naxaasta ah
 - A. *Cherma*—qiimo yar (cf. Yooxanaa 2:15)
 - B. *Chalchos*—qiimo yar (cf. Matayos 10:9; Markos 12:41)
 - C. *Assarion*—shilin naxaas ah oo Roomaanku lahaayeen qiimo ahaanna qiyaastii noqonayey 1/16 dinaar (cf. Markos 12:42; Luukos 21:22)
 - D. *Kodrantes*-- shilin naxaas ah oo Roomaanku lahaayeen qiimo ahaanna qiyaastii noqonayey 1/64 dinaar (cf. Matayos 5:26)
 - E. *Lepton*—shilin naxaas oo Yuhuuddu isticmaali jirtay qiyaas ahaanna u dhigmaayey 1/128 dinaar (cf. Markos 12:42; Luukos 21:2)
 - F. *Quadrans/farthing*—shilin naxaas oo Roomaanku isticmaali jireen oo qiimihiisu yar yahay
- II. Shilimmada qalinka ah
 - A. *Arguros* (“shilin qalin ah”)—oo aad uga qiimo badan shilimmada naxaasta iyo qalimmada ah (cf. Matayos 10:9; 26:15)
 - B. *Denarius*—shilin qalin oo Roomaanku isticmaali jireen qiimihiisuna ahaa mushaar shaqaale maalin ku shaqeehyo (cf. Matayos 18:28; Markos 6:37)
 - C. *Drachme*—shilin qalin ah oo ay lahaayeen Giriigtu una dhigmaayey qiimo ahaa dinaarka (cf. Luukos 15:9)
 - D. *Di-drachmon*—labo darkaamo oo la mid ahayd ½ shaqalkii Yuhuudda (cf. Matayos 17:20)
 - E. *Stater*—shilin qalin ah oo u dhigmaayey qiyaastii afar dinar (cf. Matayos 17:27)
- III. Shilimmada dahabka ah—chrusos (“shilinka dahabka ah”) - wuxuu ahaa shilimaadka ugu qiimaha badnaa (cf. Matayos 10:9)
- IV. Ereyada guud ee culayska biraha
 - A. *Mnaa*—Laatiin ahaan Mina, waa bir culayskeedu u dhigmo boqol dinaar (cf. Luukos 19:13)
 - B. *Talanton*—qiyaas miisaaneed Giriig ah (cf. Matayos 18:24; 25:15,16,20,24,25,28)
 1. Qalin qiimihiisu ahaa 6000 oo dinaar
 2. Dahab qiimihiisu ahaa 180,000 oo dinaar
 - C. *Shaqal*—miisaan macdanka qalinka ah (cf. Bilowgii 23:15; 37:28; Baxniintii 21:32)
 1. *Pim*—2/3 shaqal
 2. *Beka*—1/2 shaqal
 3. *Gerah*—1/20 shaqalQaybaha waaweyn
 1. *Maneh*—50 shaqal
 2. *Kikkar*—3000 oo shaqal

6:8-9 “Andaros, Simoon Butros walaalkiis” Qoraalkani waa sawir si qurux badan u muujinaya daciifnimada iimaankii Andaros iyo aaminaaddii awoodda qofnimo ee Ciise.

6:9 “Jajab kibsood” Tan waxaa lagu qiyaasaa in ay tahay kibista la cuni karo ee ugu jaban. Waxa ay ahayd cuntada ay dadka faqiirka ahu cunaan. Ciise awooddiisii uma isticmaalin in uu ku keeno cunno qaali ah!

6:10 “Dadka fadhiisiya” dhaqan ahaan dadkani waxa ay caadi ahaan wax cunaan marka ay fadhiyaan dhulka, ama iyagoo miis hooseeya oo qaabkiuu yahay xarafka “U”

▣ **“Meeshaasina waxay lahayd doog badan”** Tani waa faallo (tafa tiran) oo uu rasuulku goob joog ka ahaa

▣ **“Haddaba nimankii waa fadhiisteen, tiradooduna qiyaastii waxay ahayd shan kun”** Tani waxa ay ahayd mid qiyaas uun ah in loogu yeedho maalintan “quodintii shanta kun ee qof” waayo sida cad waxaa maalintaas goobtaa ku sugnaa dad intaa ka badan. Tiradan shanta kun ee qof waxa ay ka hadlaysaa oo qudha raga qaan gaadhka ah (i.e., 13 iyo wixii la sarreeya) lagumana tirin carruurta iyo dumarka (cf. Matayos 14:21). Arrintu si kastaba ha ahaatee, lama hubo inta carruur iyo dumar ah ee ka qayb galay (cf. Matayos 14:21).

6:11 “oo goortuu mahad naqay ayuu u qaybiyey” Mucjisadii taranka cuntada waxaa qasab ahayd in uu ka dhaco gacantii Ciise. Marka la eego aragtida Yuhuudda dhacdadani waxa ay ahayd mid calaamad u ah Masiixii la rajaynayey oo ahayd in uu cunto u siiyo si la mid ah sidii uu Muuse u siiyey maanada.

Weedhan Giriigga ah ee “mahad celin” (*eucharistee*) kaasoo gadaal ka noqonaya magaca Cashadii Ugu dambaysay (cf. I Korintos 11:23-24). Halkan miyuu Yooxanaa ku adeegsaday arrintan mustaqbal ahaan, qeexitaanka farsamo ee maskax ahaaneed? Injiillada kale ee aan tilmaamin Eucharist waxa ay adeegsadaan erey ka duwan (*eulogeo*, Matayos 14:19; Markos 6:41). Ma isticmaalaan ereyga *eucharistee* (cf. Matayos 15:36; Markos 8:6; Luukos 17:16; 18:11). Laakiin ma aha mid is haysata marka laga hadlayo cashadii ugu dambaysay. Waxa ay adeegsadaan erey la mid ah si ay u qeexaan Ciise salaaddisii mahad naqa ee qolka sare (cf. Matayos 26:27; Markos 14:23; iyo Luukos 22:17-19). Sidaas daraaddeed maaddaama isticmaalku uuna isku mid ahayn, Yooxanaa waxa uu u baahday in uu aad u qeexo wixii uu arkay maalintaa si akhristayaasha iman doona ay u tarjuman karaan tani in ay tahay dhacdadkii Eucharist!

6:12 “hallaabin” Ka Eeg Mawduuc Gaar ah: *Apollumi* 10:10.

6:13 “Sidaa aawadeed ayay ururiyeen, oo laba iyo toban dembiilood ayay ka buuxiyeen” Ereygan “sallad” halkan waxa uu ku saabsan yahay salad weyn oo aad u qaad weyn. Waxaa muhiimad leh haddaba Israa’iil Ciise uusan qasaarin cuntadii la barakadeeyay. Isla markaana muusan beddelin noocii ay ahayd kibistu. Miyey leedahay haddaba weedha “laba iyo toban” calaamad tilmaamaysa arrin muhiim ah? Aad bay u adag tahay in la xaqiijiyo. Waxaa loo tarjumay iyadoo laga soo xiganayo qabiilooyinkii Israa’iil (Ciise waxa uu dhergiyey Axdigii Hore) amaba hal salad ayaa ku hagaagaysa mid kasta oo ka mid ah laba iyo tobanka xerta ah (Ciise waxa uu dhergiyey oo uu wax siiyey dhammaan xertiisii), laakiin waxaa laga yaabaa in tani ay ahayd mid looga dan leeyahay in ay marqaati ka ahaadaan faahfaahinta (sida aayadda. 19).

MAWDUUC GAAR AH: TIRADA LABO IYO TOBAN

Labo iyo toban badiyaaba waxa ay ahayd calaamad tiro urur

A. Ka baxsan kitaabka

1. Labo iyo tobanka Burji
2. Labo iyo tobanka bilood ee sannadka

B. Axdigii Hore, (BDB 1040 lagu daray 797)

1. Wiilashii Yacquub (qabiillada Yuhuudda)
2. Ka tarjumaysa
 - a. Labo iyo tobankii tiir ee taambuugga sida ku jirta Baxniintii 24:4
 - b. Labo iyo tobankii dahab ee ku yaallay saxuuntii wadaadka sare (taasoo u taagan qabiilooyinka) sida ku qoran Baxniintii 28:21
 - c. Labo iyo tobankii kibsood ee meesha qudduuska ah ee taambuugga Laawiyiintii 24:5
 - d. Labo iyo tobankii basaas ee loo diray Kancaan Tirintii 13 (mid kastaana uu ka socday qabiil)
 - e. Labo iyo tobankii ulood (heerarka qabiilka) ee mucaaradaddii Qorax Tirintii 17:2
 - f. Labo iyo tobankii dhagax ee Yashuuca sida ku qoran Yashuuca 4:3,9,20
 - g. Labo iyo tobankii maammul degmo ee maammulkii Sulaymaan I Boqorrada 4:7
 - h. Labo iyo tobankii dhagax ee taambuuggii Eliishaah u dhisay YHWH sida ku jirta I Boqorrada 18:31

C. Axdiga Cusub

1. Labo iyo tobankii rasuul ee la doortay
2. Labo iyo tobankii salladood ee kibista ahaa (ee mid kasta loogu talo galay hal rasuul) sida ku jirta Matayos 14:20
3. Labo iyo tobanka kursi ee sida Axdiga Cusub sheegay ay xertu fadhiisanayaan (oo ku saabsan labo iyo tobanka qa biil ee reer banii Israa’iil) matayos 19:28
4. Labo iyo tobankii kooxood ee malaa’igta ahaa ee Ciise badbaadinayey sida ku jirta Matayos 26:53
5. Calaammadda muujinta
 - a. Afar iyo labaatankii oday ee ku kala fadhiyey afar iyo labaatanka kursi sida ku jirta 4:4
 - b. 144,000 (12x12,000) sida ku qoran aayadaha 7:4; 14:1,3
 - c. Labo iyo tobankii xiddigood ee ku taxnaa taajkii gabadha sida ku qoran 12:1

- d. Labo iyo tobankii albaab, labo iy tobankii malag waxa ay ka tarjumayaan labo iyo tobankii qabiilo sida ku qoran 12:1
- e. Labo iyo tobanka dhagax ee aasaaska u ah Yerusaaalem-ta cusub ee ay ku kala dul qoran yihiin magacyada labo iyo tobanka rasuul 21:14
- f. Labo iyo tobankii kun ee istaadyon sida ku jirta 21:16 (cabbirka magaalada cusub, ee Yerusaaalem)
- g. Gidaarka dhererkiisu waa 144 kubits sida ku jirta 21:7
- h. Labo iyo tobanka albaab ee luulka sida ku qoran 21:21
- i. Dhirta ku taalla Yerusaaalem-ta cusub oo leh labo iyo toban nooc oo midho ah (nooc kasta hal bil)sida ku qoran 22:2

6:14 “Nebigii” aragtidan ku saabsan Masiixa waa xigasho laga soo qaatay Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15-22 (cf. Falimaha Rasuullada 3:22; 7:37). Dadkii badnaa waxa ay garwaaqsadeen awoodda Ciise laakiin waxa ay si qaldan u fahmeen dabeecadda iyo calaammadaha ujeedkiisa.

NASB (UPDATED) TEXT: 6:15

¹⁵Ciise WUXUU gartay inay imanayaan inay qabtaan oo boqor ka dhigaan, sidaas daraaddeed ayuu mar kale keligiis buurta u baxay .

6:15 dadkii badanaa waxay ku farheen Ciise mucjisooyinkiisi Masiixinimo ee uu cuntada ku siiyay. Ayadani waxaa laga yaabaa in lala xidhiidhin karo Jirabaada ka sharka leh ee Matayos.4:3

NASB (UPDATED) TEXT: : 6:16-22

¹⁶Markii makhribkii la gaadhay ayaa xertiisii badda u baxday. ¹⁷Waxayna fuuleen doonni, oo badday ka tallaabayeen ilaa Kafarna'um. Oo markiiba gudcur bay ahayd, Ciisena weli uma UU iman. ¹⁸Badduna way isku kacday, dabayl weyn oo dhacday aawadeed. ¹⁹Haddaba markay seeb ku wadeen qiyaas shan iyo labaatan ama soddon istaadiyon, waxay arkeen Ciise oo badda ku dul socda oo doonnida u soo dhowaanaya, wayna baqeen. ²⁰laakiin wuxuu ku yidhi, Waa aniga ee ha baqina. ²¹Sidaa aawadeed waxay doonayeen inay doonnida ku qaadaan, oo markiiba doonnidu waxay joogtay dhulkay u socdeen. ²² Maalintii labaad dadkii badnaa oo badda dhankeeda kale taagnaa, waxay arkeen inaan doonni kale joogin mid maahee, oo aan Ciisena taas la fuulin xertiisii, laakiin in xertiisii keligood baxeen.

6:17 “Kafarna'um” Tani waxa ay xarun u ahayd Ciise intii uu ku guda jiray shaqadiisii wacdiska ee Galili sababtuna waxa ay ahayd rumaysaddarradii magaaladiisii Naasaret (cf. Luukos 4:28-29).

6:19 “markay seeb ku wadeen qiyaas shan iyo labaatan ama soddon istaadiyon” Qiyaas ahaan waxa ay marayeen kala badhkii harada markii ay arkeen Ciise oo biyaha ku dul lugaynaya. Matayos ayaa arrintan faahfaahin dheeraad ku sii daray kuna sheegay in Burtos qudhiisu uu kula dul socday biyaha.

▣ **“wayna baqeen”** Xartani waxay u haysteen Ciise in heerkiisu la mid yahay kan dadkan dunida. Cabsida xerta waxaa lagu dheegay Markos 6:49. Miisaanka is biirsaday ee “calaamadahan” ayaa wuxuu ku qasbay iyaga in ay dib qiimayn ugu sameeyaan kan uu yahay isagu.

6:20 “Waa aniga” tani macne ahaa (*ego eimi*) “Aniga” (cf. 4:26;8:24, 28, 54-59; 13:19; 18:5-6) tan oo ka tarjumaysa magacii axdiga ee Ilaah sida ku qoran Axdigii Hore YHWH Baxniintii 3:12-15. Ciise waa mid la arki karo “aniga” waa is muujinta Ilaah ee buuxda, ereyga Ilaah oo jidh soo xidhay, wiilka keliya ee runta ah. Ka eeg D Mawduuca Gaarka ah ee soo socda

MAWDUUC GAAR AH: MAGACYADA RABBAANIGA AH

A. *El* (BDB 42, KB 48)

1. Macnaha asalka ah ee faraca ereyga qadiimiga ah ee Rabbaani ma aha mid la hubo, inkastoo ay aqoon yahanno badani ay rumaysan yihiin in uu ka yimid asala ahaan Akkadian-ka “xoogayso” ama “awood hel” (cf. Bilowgii 17:1; Tirintii 23:19; Sharciga Ku Noqoshadiisii 7:21; Sabuurrada 50:1).
2. Caqiiqadadii reer Kancaan waxa ay ahayd *El* (Qoraallada Ras Shamra)
3. Kitaabka dhexdiisa ma jiraan ereyo kale oo ku lammaan. Isku darradan waxa uu ka dhigayaa hab muujinya sifaha Ilaah.
 - a. *EL-Elyon* (Ilaaha ugu sarreeya, BDB 42 & 751 II), Bilowgii 14:18022; Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:8; Ishacyaah 14:14
 - b. *EL-Roi* (“Ilaaha wax walba arka” ama “Ilaaha isaga qudhiisu is muujiya,” BDB 42 & 909), Bilowgii 16:13
 - c. *EL-Shaddai* (“Ilaaha sarreeya” ama “Ilaaha ugu naxariista badan” ama “Ilaahii Buurta,” BDB 42 & 994), Bilowgii 17:1; 35:11; 43:14; 49:25; Baxniintii 6:3
 - d. *EL-Olam* (“Ilaaha waara,” BDB 42 & 761), Bilowgii 21:33. Ereygan waxa uu fiqi la xidhiidhaa Ilaah ballantiisii ku aaddanayd Daa’uud, ee II Samuu’eel 7:13,16
 - e. *EL-Berit* (“Ilaaha Axdiga,” BDB 42 & 136), Xaakinnada 9:46
4. *El* waxa ay u dhigantaa
 - a. UHWH sida ku jirta Sabuurrada 85:8; Ishacyaah 42:5
 - b. *Elohim* sida ku jirta Bilowgii 46:3; Ayuub 5:8, “Waxaan ahay *El*, *Elohim-kii* Aabbahaa”
 - c. *Shaddai* sida ku jirta Bilowgii 45:29
 - d. “masayra” sida ku jirta Baxniintii 34:14; Sharciga Ku Noqoshadiisa 4:24; 5:9; 6:15
 - e. “naxariis” sida ku jirta Dharciga Ku Noqoshadiisa 4:31; Nexemyaah 9:31
 - f. “weyn oo cajiib ah” sida ku jirta Sharciga Ku Noqoshadiisa 7:21; 10:17; Nexemyaah 1:5; 9:32; Daanyeel 9:4
 - g. “aqoon” sida ku jirta I Samuu’eel 2:3
 - h. “magangalkayga xooggan” sida ku jirta II samuu’eel 22:33
 - i. “kan ii aarguda” sida ku jirta II Samuu’eel 22:48
 - j. “midka qudduuska ah”
 - k. “xoogga badan” sida ku jirta Ishacyaah 10:21
 - l. “badbaadadayda” sida ku jirta 12:2
 - m. “weyn oo awood badan” sida ku jirta Yeremyaah 32:18
 - n. “abaalmarinta” sida ku jirta Yeremyaah 51:56
5. Marka magacyada Ilaah eek u jira Axdigii Hore la isku keeno waxaa laga helayaa Yashuuca 22:22 (*Elohim*, *YHWH*. Oo swoo noqonaya)

B. *Elyon* (BDB 751, KB 832)

1. Macnaheeda aasaasiga ahu waa “sare,” “ammaanan,” ama “kor loo qaaday” (cf. Bilowgii 40:17; I Boqorrada 9:8; II Boqorrada 18:17; Nexemyaah 3:25; Yeremyaah 20:2; 36:10; Sabuurrada 18:13).
2. Waxaa qaab isla siman loogu adeegsaday dhowr magac oo kale oo Ilaah leeyahay.
 - a. *Elohim*—Sabuurrada 47:1-2; 73:11; 107:11
 - b. *YHWH*—Bilowgii 14:22; II Samuu’eel 22:14
 - c. *El-Shaddai*—Sabuurrada 91:1.9
 - d. *El*—Tirintii 24:16
 - e. *Elah*—Waxaa sida badan lagu adeegsaday Daanyeel 2-6 iyo Cesraa 4-7, oo la xidhiidha *illair* (oo afka Aramaygga ku ah “Ilaaha Sare”) sida ku jirta Daanyeel 3:26; 4:2; 5:18,21
3. Waxaa sida badan loo adeegsadaa Kuwa aan Yuhuudda ahayn.
 - a. Malkisadaq, Bilowgii 14:18-22
 - b. Balcaam, Tirintii 24:16
 - c. Muuse, oo ka hadlaya quruumaha sida ku qoran Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:8
 - d. Injiilka Luukos ee Axdiga Cusub, ee loo qoray Kuwii aan Yuhuudda ahayn, wxuu sidoo kale adeegsanayaa Giriigga oo ah *Hupsistos* (cf. 1:32,35,76; 6:35; 8:28; Falimaha Rasuullada 7:48; 16:17)

C. *Elohim* (waa jamac), *Eloah* (waa keli amah al mid), waxaa lagu adeegsaday gabayga bilowgeedii (BDB 43,

KB 52)

1. Ereygan lagama heli karo wax ka baxsan Axdigii Hore
2. Ereygan waxa uu u taagmi karaa oo qudha Ilaaha Israa'iil ama Ilaaha quruumaha (cf. Baxniintii 12:12; 20:3). Ibraahim qoyskiisu waxa ay ahaayeen kuwo Ilaahyo kale u adeega (cf. Yashuuca 24:2).
3. Waxa ay la xidhiidhi kartaa xaakinnadii Israa'iil (cf. Baxniintii 21:6; Sabuurrada 82:6).
4. Ereyga *Elohim* waxaa sidoo kale loo isticmaalaa waxyaabo kale oo ruuxi ah sida (malaa'igaha, iyo jinka) sida ku jirta Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:8 (LXX); Sabuurrada 8:5; Ayuub 1:6; 38:7.
5. Kitaabka Qudduuskaah dhexdiisa waa magaca ugu horreeya ee Ilaah (cf. Bilowgii 1:1). Waxaa si toos ah loo adeegsanaanayaa illaa Bilowgii 2:4, halkaasoo ay la xidhiidho YHWH. Waxay si aasaasi ahaan (fiqi ahaan) ka hadlaysaa Ilaaha ah abuuraha, waaraha, iyo kan quudiya naf kasta oo meerahan guudkiisa saaran oo dhan (cf. Sabuurrada 104).

Waxa ay sami la tahay *El* (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:15-19). Waxa ay sidoo kale la sinnaan kartaa YHWH sida ku jirta Sabuurrada 14 (*Elohim*) sida saxda ah waa sida Sabuurka 53 (YHWH), marka laga reebo beddelka magacyada Ilaahiyanka ah.

6. In kastoo magacan loo adeegsaday jamac ahaan ilaahyo qalaad ama been ahna loogu yeedhay, haddana waxa uu si gaar ah u tilmaamayaa Ilaaha Reer Banii Israa'il, laakiin aalaba waxa ay leedahay falka keliga ah ee aan jamaca ahayn si loogu caddeeyo THE MONOTHEISTIC USAGE.
7. Ereygan waxaa laga helay carrabkii kuwii aan reer binu Israa'iil u dhalan iyagoo magaca Ilaah u adeegsanaya.
 - a. Malkisadaq, Bilowgii 14:18-22
 - b. Balcaam, Tirintii 24:2
 - c. Muuse, markii uu quruumaha la hadlayey, Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:8
8. Waa wax la yaab leh in magaca guud ee Ilaaha reer Banii Israa'iil uu jamac noqdo! Inkastoo aan la hayn xaqiiqda, halkan ayey aragtiyadu yaallaan.
 - a. Cibraanigu waxa uu lehay jamacyo badan, oo had iyo loo adeegsaday adkayn ama muujin. Waxa ay aad ugu dhowdahay qoraal naxweedka Cibraaniga ah ee loogu yeero "Jamaca weynaynta," halkaasoo ereyga jamaca loo adeegsanayo in wax lagu weynayo ama lagu qaddariyo.
 - b. Tani waxa ay la xidhiidhi kartaa golaha malaa'igeed, ee uu Ilaah kula kulmo jannada ee sameeya doonistiisa (cf. I Boqorrada 22:19-23; Ayuub 1:6; Sabuurrada 82:1; 89:5, 7).
 - c. Sidoo kale waxaa xitaa macquul ah in tani ay wax ka sheegayso Axdiga Cusub muujintiisa saddxmidnimada Ilaah. Sida ku jirta Bilowgii 1:1 abuuruhu waa Ilaah. Bilowgii 1:2 Ruuxu wuu calool dhaqdhaqaaqaa, Axdiga Cusub dhexdiisana Ciise waa Ilaaha Aabbaha ah wakiilkiisa qaaska ah ee uunka (cf. Yooxanaa 1:3, 10; Rooma 11:36; I Korintos 8:6; Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:2; 2:110).

D. YHWH (BDB 217, KB 394)

1. Kani waa magac Ilaah ku sifaynaya in uu yahay Ilaah sameeya axdiga, Ilaaha badbadiyaha ah, ee madaxfurashada! Aadanuhu way jabiyaan axdiga, laakiin Ilaah waa caddaaladsame daacad u ah Ereygiisa, ballanta axdiga (Sabuurrada 103).

Magacan waxaa larkii koowaad la sheegay isagoo uu ku xidhan yahay *Elohim* sida ku jirta Bilowgii 2:4. Labo uun ama abuur oo laguma wada sheegin Bilowgii 1-2, laakiin labo caddaymood (1) Ilaah oo ah abuuraha caalamka oo dhan (si jidh ahaaneed) iyo (2) Ilaah oo ah abuuraha aadanaha. Bilowgii 2:4-3:24, waxaa ka bilowda mujinta ku saabsan booska muhiimadda leh iyo sida aadanuhu muhiim u yahay, iyo sidoo kale dhibaataadii dembiga ee fallaagonimadii la xidhiidhay booskii gaarka ahaa.

2. Bilowgii 4:26 "markaasaa *dadkii* waxay bilaabeen inay Rabbiga ku baryaan magiciisa" (YHWH). Arrintu is kastaba ha ahaatee, Baxniintii 6:3 waxa ay tilmaamaysaa in dadkii hore ee axdiga (odayyadii iyo qoysaskoodii) waxa ay Ilaah u yaqaanneen oo keliya *El-Shaddai*. Magaca YHWH hal waqti oo qudha ayaa lagu sharraxay Baxniintii waa Baxniintii 3:13-16, gaar ahaan aayadda. 14. Arrintu si kastaba ha ahaatee, qoraalladii Muuse waxa ay had iyo goor ereyada ku tarjumaan ereyo caansan oo door ah laakiin ma aha habka ereyga uu yahay ama qaabka toona (cf. Bilowgii 17:5; 27:36; 29:13:35). Waxaa jiray dhowr aragtiyoodoo ku saabsan macnaha magacan (oo laga soo qaday IDB, raaca. 2, bogagga409-11).
 - a. Erey asal ahaan ka yimid Carabiga "in la muujiyo jacayl xamaasad leh"
 - b. Erey asal ahaan kayimid carabiga "in la afuufo" (YHWH oo ah Ilaah dabayl ah)

- c. Waa erey asal ahaan ka yimid afka Ugartic (reer Kancaan) “in la hadlo”
 - d. Marka la raaco habka dhawaqa qoraalka ereyga, waxa uu noqonayaa qayb sababeed oo macnuhu yahay “kan wax waariya,” ama “kan wax aasaasa”
 - e. Marka la eego cibraaniga *Qal* waa “kan jira,” ama “kan jooga” (marka ay mustaqbalka ay tahayna , “kan ahaan doona”)
 - f. Marka la eego Cibraaniga *Hiphil* “kan sababa in ay wax ahaan”
 - g. Marka la eego ereyga xididka ah ee cibraaniga waa “in la noolaado” (tusaale, Bilowgii 3:20), oomacnuhu yahay “weligii jiraya, kan keliya- ee nool”
 - h. Marka laga eego macnaha buud ee Baxniintii 3:13-16 waa fal loo adeegsaday erey aan ebyanayn oo oo ka yimid mid loo adeegsaday mid ebyan, “waxaan sii wadi doonaa in aan ahaado wixii aan ahaan jiray” ama “waxaan sii wadi doonaa in aan ahaado wixii aan had iyo goor ahaa” (cf. Wash Watts, *A Survey of Syntax in the Old Testament*, bogga 67). Magaca buuca ee YHWH waxaa had iyo goor lagu qeexi jiray qaab soo gaabin ah ama habka asalka ah,
 - (1) *Yah* (tusaale ahaan, Hallelu – yah, BDB 219, cf. Baxniintii 15:2; 17:16; Sabuurada 89:9; 104:35)
 - (2) *Yahu* (“iah” oo ay magacyo ku dhammaadaan sida, Isiah)
 - (3) *Yo* (“jo”) oo gala bilowga magacyada, sida, Joshua ama Joel)
3. Marka la soo gaaro xilligii sharcigii Yuhuudda magacani waxa uu noqday qudduus (tetragrammation) Yuhuuddu waxa ay ka baqeen in magacan loogu yeedho kan dambe waxa ay jebiyeen amarkii Baxniintii 20:7; Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:11; 6:13. Sidaas daraaddeed waxay booskiisii geliyeen erey Cibraani ah oo macnihiisu yahay “milkiile,” ama “taliye,” “guuleed,” “seyid”. Waa tan sababta YHWH uu tarjumaannada Ingiriisiga ah ugu qoran yahay SAYID.
4. Sida *el*, YHWH waxaa had iyo goor la socda hal erey oo kale, halkan waxaa ah qaar.
- a. *YHWH – Yireh* (YHWH ayaa wax siin doona, BDB 217 & 906), Bilowgii 22:14
 - b. *YHWH – Rophekka* (YHWH ayaa ah bogsiiyahaaga, BDB 217 & 950, *Qal* ereyga falsameeyahaah heerkisa saddedda), Baxniintii 15:26
 - c. *YHWH – Nissi* (YHWH ayaa ah kan wax iga xarrima, BDB 217 & 651), Baxniintii 17:15
 - d. *YHWH – Meqadishkem* (YHWH oo ah kan qudduuska kaa dhiga, BDB 217 & 872, *Piel* ereyga falsameeyahaah heerkisa saddedda), Baxniintii.
 - e. *YHWH – Shalom* (YHWH oo ah nabad, BDB 217 & 1022), Xaakinnadii 6:24
 - f. *YHWH – sabboaoth* (YHWH oo ah kan wax marti geliya, BDB 217 & 878), I samuu’eel 1:3,11; 4:4; 15:2; sida badan nebiyadii dhexdoodii
 - g. *YHWH – Ro’I* (YHWH waa adhijidhkayga, BDB 217 & 944, *Qal* ereyga falsameeyahaah heerkisa saddedda), sabuurada 23:1
 - h. *YHWH – Sidqenu* (YHWH waa xaqnimadeenna, BDB 217 & 841), Yeremyaah 23:6
 - i. *YHWH – Shammah* (YHWH halkaasuu joogaa, BDB 217 & 1027), Yexesqel 48:35

6:21 “oo markiiba doonnidu waxay joogtay dhulkay u socdeen” tani waxa ay si toos ah u ahayd dhacdo kale oo mucjiso ah (cf. 22-25) maaddaana uu Injiilka Markos uu sheegayo in ay badda in kala badh ah ah socdeen (cf. Markos 6:47). Arrintu si kastaba ha ahaatee, injiillada kale laguma dhex sheegin (i. e., Matayos 14:32 ama Markos6:51).

NASB (UPDATED) TEXT: 6:22-25

²²Maalintii labaad dadkii badnaa oo badda dhankeeda kale taagnaa, waxay arkeen inaan doonni kale joogin mid maahee, oo aan Ciisena taas la fuulin xertiisii, laakiin in xertiisii keligood baxeen. ²³laakiin waxaa Tiberiyas ka yimid doonniyo, wayna u soo dhowaadeen meeshii kibistii lagu cunay markuu Rabbigu mahad naqay dabadeed. ²⁴Markii dadkii badnaa arkeen inaan Ciise halkaas joogin iyo xertiisiiba, waxay fuuleen doonniyihii, wayna yimaadeen Kafarna'um, iyagoo Ciise doondoona. ²⁵Oo markay isaga ka heleen badda dhinaceeda kale, waxay ku yidhaahdeen, “Macallimow, goormaad halkan timid?”

6:23 “Tiberiyas” Magaaladan waxaa dhisay Herados Antibas 22 A. D oo caasimaddiisii ayey noqotay.

NASB (UPDATED) TEXT: 6:26-34

²⁶Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Iima doondoontaan calaamooyinkii aad aragteen aawadood ee waa kibistii aad cunteen oo aad ka dheregteen aawadeed. ²⁷Ha u shaqaynina cuntada hallaabaysa, laakiin u shaqeyta cuntada sii jiraysa ilaa nolosha weligeed ah ee Wiilka Aadanahu idin siin doono, waayo, isaga Aabbaha Ilaaha ah ayaa caddeeyey. ²⁸Sidaas aawadeed waxay ku yidhaahdeen, Maxaannu yeelnaa si aannu shuqullada Ilaah u samayno? ²⁹Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Kanu waa shuqulkii Ilaah inaad rumaysataan kii uu soo diray. ³⁰Sidaas darteed waxay ku yidhaahdeen, Haddaba calaamadee baad samaynaysaa inaannu aragno oo ku rumaysanno? Maxaad. samaynaysaa? ³¹Awowayaasheen waxay cidlada ku cuneen maannada sidii loo qoray, Wuxuu samada ka siiyey kibis ay cunaan. ³²Haddaba Ciise wuxuu ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Muuse samada idinkama siin kibistii, laakiin Aabbahay baa samada idinka siiya kibista runta ah. ³³Waayo, kibista Ilaah waa kan samada ka soo degay oo dunida nolosha siiya. ³⁴Haddaba waxay ku yidhaahdeen, “Sayidow, kibistan mar walba na sii.”

6:26, 32, 53 “Runtii, runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay” “Aammiin, ” “Aammiin.” Tani waa weedh cibraani oo saddex qaab loo adeegsado.

1. Adxigii Hore dhexdiisa ereyga waxaa loogu adeegsaday “aaminaad.” Waa ereyga muujineed loola jeeday “in mid adag la noqdo” waxaana loo adeegsan jiray in lagu qeexo rumaysadka uu midi YHWH u qabo.
2. Ciise adeegsigiisii ayaa muujinaya hordhaca hadalka cayiman oo muhiimka ah. Wax kale oo taariikh soo jireen ah uma haynno “Aammiin” marka ay sidan tahay.
3. Kaniisaddii hore, sida Adxigii Hore, waxa ay noqotay erey erey adkayn ama heshiis ah.

Ka Eeg Mawduuc Gaar ah: Aammiin 1:51.

▣ **“ee waa kibistii aad cunteen”** ujeeddooyinkoodu waxay ahaayeen kuwo jidh ahaaneed iyo in ay wax eegaan, ma ahayn ruuxa iyo nolosha weligeed ah.

▣ **“oo aad ka dheregteen aawadeed”** Ereygan waxaa loola jeeday “to gorge, ” “in laga wabxo, ” waxaa aalaaba loo adeegsan jiray xoolaha (sida badan lo’da).

6:27 “Ha u shaqaynina” Kani waa fal amar taagan oo kan dhexe ah oo ay qayb diidmo la socoto kaasoo had iyo goor macnihiisu yahay in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray. Asalka tuducdan Axdiga Cusub dhexdiisa waa Ishacyaa 5. Wadahadalkani waxa ay la siman yahay kii haweenaydii kula yeeshay ceelkii agtiisa sida ku jirta Yooxanaa 4.

▣ **“hallaabaysa”** Ka Eeg Mawduuc gaar ah: *Apollumi* 10:10.

▣ **“isaga Aabbaha Ilaaha ah ayaa caddeeyey”** Tani waxa ay macne ahaan tilmaamaysaa marka laga hadlayo ereyga “caddeeyay” awood lahaansho, milkiilenimo, wax xukun leh, iyo weliba ammaanka (cf. NEB iyo Matayos 28:18; Yooxanaa 17:2). TEV iyo NIV waxa ay ereygan u tarjumaan “la aqbalay” maaddaama loo isaticmaalayo in lagu tilmaamayo Ilaaha Aabbaha aqbalaaddiisa adeegga Ciise. Sharci ayey noqonaysaa marka aad eegto sida loogu tarjumay qoraalkii afka ahaa ee (Talmud). Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:33, halkaasoo laga yaabo inay sheegayso Ruuxa Quduuska ah.

6:28 “Maxaannu yeelnaa si aannu shuqullada Ilaah u samayno?” tani waxa ay ahayd midda udub dhexaadka u ah su’aalaha hoggaamiyayaasha diinta ee qarnigii koobaad (Luukos 18:18). Hoggaamiyayaasha diintu waxay isu haysteen kuwo Ilaah hortiiisa sax ku ah iyadoo taasina ku salaysan tahay (1) dhaxaltooyadooda iyo (2) iyagoo sharciga Muuse ugu dhaqmaya dhaqan ahaan (Talmuudka).

6:29 “Kanu waa shuqulkii Ilaah inaad rumaysataan kii uu soo diray” Kani fal toogan oo toosan oo wax u taagane ah oo ay la socoto qayb Aorst fal taagan oo wax caddaynaya ah. Ereyga “rumayn” waa mid aad muhiim ugu ah waxs barista Axdiga Cusub eeku saabsan badbaadada. Ka Eeg Mawduuc Gaar ah: 2:23. Qaabka markii koowaad loo soo bandhigay ereygu waa aaminaad rajayn. Ereyada Giriigga ee koox ahaanta isku raaca sida *Pists* oo loo tarjumi karo “rumayn,” “aamminid” ama “rumaysad.” Rumaysadka ay aadanuhu diiradda saarayaan waa in uu ahaadaa “Isaga” (cf. 1:23; 3:16), ama aha daacadnimada, toosnaanta ama shaqada jidh ahaaneed. Bandhigga tooska ah ee tuducdan waa xidhiidha shaqsi ahaaneed oo lala yeesho Ciise Masiix, ma aha fiqigii asal raaca eek u saabsanaa Isaga, ee ay kuwii diinta ku adkaa ay filayeen, ama nolosha sinji ahaaneed. Kuwan oo dhan waa kuwo caawimaad leh laakiin ma aha kuwo heerka koowaad taagan. Ogsoonow in Ciise jamacii “shuqullada” ee su’aashoosii u beddelay mid keliga ah “hal shaqo.”

Ereyga “isoo diray” Mawduuc Gaar ah: Diris (*Apostello*) ka eeg 5:24.

6:30-33 Waa in la xusuustaa in kooxdan ay markan ka qayb galeen mucjisadii quudintii shanta kun. Horay ayey calaamaddooda u haysteen. Yuhuuddii madhabtii rabbaanigu waxay Masiixa u maleeyeen in uu dib u soo celin doonay falimihii Axdigii Hore, sida in uu cuntada Mana dusha ka keenayo (cf. II Baruch 29:8). Kuwii rabbaaniyiinta ahaa waxay u adeegsadeen Sabuurrada 72:16 qoraal caddayn ah aragtidan ah “Muusaha Sare” nooc Masiixa ah (cf. I Korintos 1:22).

Waxaa jira sife naxweed muhiim ah oo u dhexeeya “in la rumeeyo Isaga” ee aayadda 29 iyo “ku rumaysanno” ee aayadda 30. Marka koowaad waxa ay diiradda saaraysaa Yooxanaa dhismihiisii joogtada ahaa ee ku saabsanaa in la rumaysto/lagu rumaysto Ciise. Waad ujeed shaqsi ahaaneed. Tan labaad waxa ay diiradda saaraysaa rumaysadka ereyadii Ciise ama doodihiisii taasoo ah ujeed farxad leh. Xusuusnow, Injiilku waa shaqsi iyo farriin labadaba. Ka eeg Mawduuc Gaar ah 2:23.

6:31 “sidii loo qoray” Waa qayb weedh fal ebyamay oo aan toosnayn ah. Waxa ay ahayd hab naxwaheeda la fadhiisiiyey si loogu baro xigashooyika Qorniinka ee ka imanaya Axdigii Hore. Waxa ay ahayd hadal sarbeebad adkaynaya waxygii iyo awooddii Axdigii Hore. Xigashadani waxa ay la xidhiidhi lahayd mid ka mid ah dhowr qoraal ama isku xidh: Sabuurrada 78:24; 105:40; Baxniintii 16:4, 15, ama Nexemyaah 9:15.

6:32 Ciise waxa uu tilmaamayaa Yuhuudda fiqigoodii dhaqan ahaaneed. Waxay ku hal qabsadeen in Masiixu uu fuliyo shaqooyin-yaab leh sidii Muuse oo kale sababtuna waxa ay tahay sida ku jirta Sharciga Ku Noqoshadiisii 18:15, 18. Saddex tilmaamood ayuu Ciise maladoodii ku saxayaa.

1. Waa Ilaah, ee ma aha Muuse, kan bixiyeye maanada
2. Maannadu ma ahayn mid ka timid xagga jannada asal ahaan inkastoo dadku u maleeyey in ay ahayd (cf. Sabuurrada 78:23-25)
3. Kibista runta ah ee jannadu waxay ahayd Ciise, kaasoo aan ahayn mid horay u tegay, laakiin waqti xaadirkan jooga.

6:33 “waa kan samada ka soo degay oo dunida nolosha siiya” Tani waa taswiir ku soo celis ah oo ku jirta Yooxanaa (cf. 3:13:) waa nolol toos ah. Sida macnahan ku jirta toddobo jeer ayaa Ciise faraca uu ka soo jeedo lagu caddeeyey (cf. 6:33, 38, 41, 42, 50, 51, 58). Waxa ay muujinaysaa Ciise sii jiritaankiisii taariikhda ka hor, oo uu yahay mid si asal ahaan rabbaani (cf. aayadaha. 33, 38, 41, 42, 50, 51, 58 iyo 62). Iyadu sidoo kale waa door sheegaya “manna” sidii Ciise oo ah kibista runta ah, kibista nolosha.

Tani waxa ay macne ahaan noqonaysaa “Kibista Ilaah waa kan samada kore ka timaadda ee hoos u soo daaddegta.” Weedhani waa qayb fal labood oo fal taagan oo toosan ah oo tilmaamaysa (1) kibista ama (2) nin, Ciise. Had iyo iyo goor sida ku jirta Yooxanaa shakiyadani waa kuwo ujeed ku socda (double entendres).

▣ **“oo dunida nolosha siiya”** Tan ayaa ah ujeeddadii uu Ciise u yimid (cf. 3:16; Markos 10:45; II Korintos 5:21). Hadafku waa “nolol cusub,” “nolol weligeed ah,” “nolol fac cusub,” oo u ahaata adduunka lumay ee fallaagada ah, maaha qaar ama koox gaar ah (Yuhuudda/kuwa aan Yuhuudda ahayn, kuwo la doortay/kuwo aan la dooran, muxaafid/kuwa dhexdhexaadka ah), laakiin kulligood u ahaatay!

6:34

NASB, NKJV
NRSV, TEV

“Sayid”

NJB, NET Bible,

NIV, REB

“Mudane”

Tabadan erey labaduba waxa ay muujinayaan labo macne oo kal duwan oo afka Cibraaniga ah *kuiros*. Sida macnaha guud uu noqonayo, waxaad mooddaa in wajiga labaad ayaad u muuqda kan ugu fiican. Dadkii badnaa maysan fahmin Ciise ama Ereyadiisii. Iyagu umaysan qaadan in uu yahay Masiixa (sidoo kale ogsoonow 4:14; 5:7).

▣ **“kibistan mar walba na sii”** Tani waxa ay la mid tahay hadalkii naagtii joogtay ceelka agtiisa sida ku jirta Yooxanaa 4:14. Yuhuuddani uma aysan fahmin Ciise tilmaamihiisii ruuxiga ahaa middoodna. Kani waa mawduuc Yooxanaa dhexdiisa ku soo noqonoqonaya.

NASB (UPDATED) TEXT: 6:35-40

³⁵Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Anigu waxaan ahay kibista nolosha. Kii ii yimaadaa ma gaajoon doono, kii i rumaystaana ma harraadi doono weligiis. ³⁶Laakiin waxaan idiin sheegay inaad i aragteen, mase rumaysataan. ³⁷Dhammaan wuxuu Aabbuhu i siiyo way ii iman doonaan, oo kii ii yimaadana ma eryi doono. ³⁸Waayo, waxaan samada uga soo degay ma aha inaan doonistayda yeelo, laakiinse inaan yeelo doonista kii i soo diray. ³⁹Tanu waa doonistii kii i soo diray in kuwii uu dhammaan i siiyey aanan midna ka lumin, laakiin inaan maalinta u dambaysa soo sara kiciyo. ⁴⁰Waayo, tanu waa doonistii Aabbahay in mid kasta oo Wiilka arka oo rumaysta uu nolosha weligeed ah lahaado, aniguna maalinta u dambaysa waan soo sara kicin doonaa.

6:35 “Anigu waxaan ahay kibista nolosha” Weedhani waxa ay ka mid tahay weedhaha “Anigu Waxaan Ahay” waxa ay ka mid tahay bandhigga Yooxanaa (cf. 6:35, 41, 48, 51; 8:12; 10:7, 9, 11, 14; 11:25; 14:6; 15:1, 5). Injiilka Ciise waxa uu diiradda saaraa shaqsiyadda ama qof ahaanta Masiixa. Tani waxa ay la xidhiidhaa filashooyinkii ay Yuhuuddu qabeen ee Manna iyo bixiyaha sharciga cusub oo baxniin cusub keeni lahaa ee la keeni lahaa (dembiga). Mawduuc gaar ah ka eeg 8:12.

▣ **“Kii ii yimaadaa ma gaajoon doono, kii i rumaystaana ma harraadi doono weligiis”** Kuwani waa labo diidmo oo calculus oo afka Giriigga ku jira, “marnaba weligeed, marna ma dhacayso” (cf. aayadda. 37).

Waxaa jira xidhiidh isla le’ed oo ka dhexeeya “yuimaaddaa ” iyo “rumaystaa” (cf. 7:37-38, oo la mid ah “arkaa” iyo “maqalaa”). Labaduba waa falal taagan oo heerka saddexaad ah. Rumaystaha imaatinkiisa iyo rumaystiisu ma aha go’aanno hal waqti ah, laakiin bilow hab nololeed is weheshi, saaxiibtinimo iyo xernimo.

▣ **“Gaajo. .Harraad”** gaajada iyo harraadka waxaa ad iyo goor loo isticmaali jiray run ruuxi ahaaneed (cf. Sabuurrada 42:1; Ishacyaah 55:1; Caamos 8:11-12; Matayos 5:6).

6:36 “inaad i aragteen” Maqaati furro waayadii hore ah (MSS N, A, iyo kuwo badan oo laatiinkii Hpore ah, Fuulgaytkii, iyo qaybihii Siiriyaagga) waxa ay ka saarayaan “Aniga, ” iyagoo Ciise hadalkiisa la xidhiidhiya Tilmaantiisa ama calaammaddiisii (i.e., quudintii dadkii badnaa). Magac-u-yaalku Qoraallo badan oo Giriig ahqaarkood ayuu ku jiraa iyo qaybo UBS² ka mid ah ma uusan go’aamin midka rasmiga ah.

6:37 “Dhammaan wuxuu Aabbuhu i siiyo way ii iman doonaan” Caddaymaha ugu horreeya ee cutubkan waxa uu ku aaddan yahay saldannadda sare ee Ilaah. labo curis oo kale oo arrintan tilmaamaya fiqigan waxa ay ku jiraan Rooma 9 iyo efesos 1:3-14. Waa wax aad xiiso u leh in labada macnee guud ee halkan ku jira ay tilmaamayaa la doonayo aadanaha jawaab celintiisa ama ficil celintiisa. Rooma 10 waqxaa ku jira weedho kuwan oo dhan tilmaamaya. Sidoo kale waa arrinta ku jirta Efesos 2, halkaasoo Nimcada Ilaah sida ku jirta aayadda. 1-7 ay tahay ugu yeedhita rumaysadka sida ku jirta aayadaha. 8, 9. Qaddarta hore waa fiqi0ga madaxfurashada, ee caqabad kuma aha kuwa aan badbaadin. Furaha fiqiga lagu furayo waa jaqcaylka iyo nimcada Ilaah, ma aha heer la gaadhayo. Xusuusnow in dhammaan kuwa uu Ilaah siiyey Ciise ay u “imanayaan” Isaga. Sidoo hindisaha Ilaah ayaa qaata (cf. aayadaha. 44, 65), laakiin aadanuhu waa ay jawaab bixiyaan (cf. 1:12; 3:16). Mawduuc Gaar ah ka eeg 3:16.

▣ **“oo kii ii yimaadana ma eryi doono.”** Tilmaantani waa labo diidmo oo kale oo xooggan. Tani waxa ay caddaynaydaa runta ah in Ilaah u yeedho oo soo dhaweeyo mid kasta isagoo Masiixa u soo marinaya(cf. Yexesqeel 18;21-23; 30-32; I Timoteyos 2:4; II Butros 3:9). Ilaah ayaa had iyo goor qaata hindisaha (aayadha 44, 55), laakiin aadanuhu waa in au jawaabaan (cf. Markos 1:15; falimaha Rasuullada 20:21), alla muxuu yahay curis fiican oo ku aaddan aammaanka (cf. Rooma 8:31-39)!

MAWDUUC GAAR AH: HUBSASHADA MASIIXIGA

Hubsashadu waa (1) runta ku jirta kitaabka Qudduuska ah, (2) qibradda rumaysadka rumaystaha, iyo (3) habka nolosha.

- A. Aasaaska Kitaabka Qudduuska ahi waa
 1. Dabecadd Ilaaha Aabbaha ah
 - a. Bilowgii 3:15; 12:3
 - b. Sabuurrada 46:10
 - c. Yooxanaa 3:16; 10:28-29
 - d. Rooma 8:38-39
 - e. Efesos 1:3-14; 2:5,8-9
 - f. Filiboy 1:6
 - g. II Timoteyos 1:12
 - h. I Butros 1:3-5
 2. Ilaaha Wiilka ah shaqadiisa
 - a. Tukashadiisa wadaad ahaaneed, Yooxanaa 17:9-24, gaar ahaan aayadda. 12
 - b. Utaagnaantiisa sidii waaqdaaac allabari oo kale
 - 1) Rooma 8:31
 - 2) II Korintos 5:21
 - 3) I Yooxanaa 4:9-10
 - c. Sii wadiddiisa dhexdhexaadinta
 - 1) Rooma 8:34
 - 2) Cibraaniyada 7:25
 - 3) I Yooxanaa 2:1
 3. Ilaaha Ruuxa ah sahliddiisa
 - a. U yeedhiddiisa, Yooxanaa 6:44,65
 - b. Bogsiintiisa
 - 1) II Korintos 1:22; 5:5
 - c. Hubsashadiisa shaqsi ahaaneed
 - 1) Rooma 8:16-17
 - 2) I Yooxanaa 5:7-13
- B. Rumaystaha jawaabtiisa axdi ahaaneed ee lagama maarmaankaahi waa
 1. Bilaabis iyo sii wadis tawbadkeen iyo rumaysad
 - a. Markos 1:15
 - b. Yooxanaa 1:12
 - c. Falimaha Rasuullada 3:16; 20:21
 - d. Rooma 10:9-13
 2. Xusuusnaanta in yoolku yahay U-ekaanta Masiixa
 - a. Rooma 8:28-29
 - b. Efesos 1:4; 2:10; 4:13
 3. Xusuusnaanta in hubsashda lagu xaqiiqsado habka nolosha
 - a. Yacquub
 - b. I Yooxanaa
 4. Xusuusnaanta in hubsashda lagu xaqiiqsado rumaysad iyo tawbadkeen
 - a. Markos 13:13
 - b. I Korintos 15:2
 - c. Cibraaniyada 3:14; 4:14
 - d. II Butros 1:10
 - e. Yuudas aaydaha 20-21

6:38 “waxaan samada uga soo degay” Kani waa fal ebyamay oo ka hadlaya dhalashada labaad (cf. Yooxanaa 1:1ff; efesos 4:8-10), oo natiijooyinkiisu yjoogayaan. Waxa uu sidoo kale muujinayaa sidii uu asal ahaan Ciise u ahaa samaawiga (cf. aayadaha 41, 62).

▣ **“ma aha inaan doonistayda yeelo, laakiinse inaan yeelo doonista kii i soo diray”** Axdiga Cusub waa uu tilmaamayaa lbadaba saddexmidnimada (Ka eeg Mawduuc Gaar ah 14:6), tusaale ahaan 14:8-9 iyo shaqsiyadda saddexda shaqsi (cf. 14:8-9). Aayaddani waxa ay qayb ka tahay Yooxanaa caddayntiisa socota eek u aaddan sidii uu Ciise isugu dhiibay aabbaha. Ogaysiis buuxa ka eego 5:19. Kawduuc Gaar ahka eeg: Diris (*Apostello*) 5:24.

6:39 “in kuwii uu dhammaan i siiyey aanan midna ka lumin” Waxaa jira xidhiidh cad oo ka dhexeeya falka keligii ah ee waxa aan caqliga lahayn tilmaamaya “All that” ee aayadda. 37 [laakiin Af Soomaali ahaan waa (KUWII)] iyo kan la midka ah eek u jira aayadda. 39. Dhowr jeer ayuu Yooxanaa habkan aan caadiga ahayn adeegsaday (cf. 17:2, 24). Waxa ay si bayaan aha u caddaynaysaa arrinta guud ee buuxda (cf. aayadaha. 40, 45).

Tani waa ballan weyn oo ah xajinta awoodda Ilaah, oo ah isha hubsashada Masiixiga (cf. Yooxanaa 10:28-29; 17:2, 24, kana eeg Mawduuc Gaar ah I Yooxanaa 5:13). Xusuusnow in ereyga falka ah ee ku jira aayadda. 37 uu yahay fal taagan, halka kan ku jira aayadda. 39 uu ka yahay fal ebyamay. Hadiyadda Ilaah waa taageero! Sidoo kale labada tilmaamood ee aayadda. 39 labaduba waa AORIST toosan; Ciise ma lumiyo wixii uu Aabbuhu siiyey Isaga (aayadaha. 37 iyo 39), oo wuu soo sarakicinayaa dhammaan kuwii isaga la siiyey maalinta ugu dambaysa (cf. aayadda. 44). Halkan waxaa ah ballammada rabbaaniga ah ee (1) Doorasho iyo (2) adkaan!

Ujeedkan ah maalinta xukunka ama dhammadka (eyelid iyo diidmo labadaba) waxaa loo yeelay dhowr magac.

1. Maalmaha ugu dambaysa, 6;39, 40, 44, 54; 11:24; 12:48; II Timoteyos 3:1; I Butros 1:5; II Butros 3:3
2. Waqtiga ugu dambeeya, I Yooxanaa 2:18; Yuudas aayadda. 18
3. Maalintaas, Matayos 7:22; II Timoteyos 1:12, 18; 4:8
4. Maalin, Falimaha Rasuullada 17:31
5. Maalinta weyn, Yuudas aayadda. 6
6. Maalinta, Luukos 17:30; I Korintos 3:13; I Tesaloniika 5:4; Cibraaniyada 10:25
7. Maalintiisa, Luukos 17:24
8. Maalinta Rabbiga, I Tesaloniika 5:2; II Tesaloniika 2:2
9. Maalinta Masiixa, Filiboy 1:10; 2:16
10. Maalinta Rabbi Ciise Masiix, I Korintos 1:8; 5:5
11. Maalinta Rabbi Ciise, II Korintos 1:14
12. Maalinta Ciise Masiix, Filiboy 1:16
13. Maalinta Wiilka aadanaha, Luukos 17:24 (sidoo kale ka eeg #7)
14. Maalinta xukunka, Matayos 10:15; 11:22, 24; 12:36; II Butros 2:9; 3:7; I Yooxanaa 4:17
15. Maalin cadho, Muujintii 6:17
16. Maalinta weyn ee Ilaah, 16:14

▣ **“laakiin inaan maalinta u dambaysa soo sara kiciyo”** Tani waxa ay tilmaamaysaa sarakicidda rumaystayaasha laakiin xukun u ah kuwa aan rumaysadka lahayn (cf. aayadaha 40, 44, 54; 5:25, 28; 11:24 iyo I Korintos 15). Franka Stagg waxa uu hadal caawimaad leh oo ku saabsan tilmaantan ku hayaa buuggiisa *A New Testament Theology*:

“Injiilka Yooxanaa waa caddayn ku saabsan mustaqbal imanaya (14:3, 18 f., 28; 16:16, 22) oo waxa uu si cad uga hadlaa sarakicidda iyo xukunka ugu dambeeya ‘ee maalinta ugu dambaysa’ (5:28 f., 6:39 f., 44, 53; 11:24; 12:48); weliba iyada oo u sii gudbaysaa injiilkan afraad, nolosha weligeed ah, xukunka, iyo sarakiciddu waa run watigan la joogo taagan (3:18 f.; 4:23; 5:25; 6:54; 11:23 ff.; 12:28, 31; 13:13 f.; 14:17; 17:26)” (Bogga311).

6:40 “anu waa doonistii Aabbahay” Tani waa ciise jawaabtiisii ee su’aashii aayadda. 28, “Maxaannu yeelnaa si annu shuqullada Ilaah u samayno?” Mawduuc Gaar ah ka eeg: Doonista Ilaah 4:34.

▣ **“in mid kasta oo Wiilka arka”** Qaybaha falka taagan ee toosan ee “arka” iyo “rumeeya” waa kuwo isla siman (sida “yimaadda” “rumeeya” sida ku jirta aayadda. 35. si la mid ah sida “arka” iyo “maqla”). Kuwan oo dhammi waa ficillo socda, ee ma aha dhacdooyin waa waayada ka mid ah dhacay. Ereyga “arka” waxaa loola jeedaa “in feejignaan leh loo qiyaaso” wax si loo fahmo ama loo garto.

Si hubaal ayaan anigu u jecelahay ereyga “mid kasta” (*pas*), ogsoonow in

1. Dhammaantood ay isaga ku rumaysan doonaan, 1:7
2. Oo uu iftiimiyo aadane kasta, 1:9
3. Mid kasta oo rumeeyo oo ku jira uu leeyahay nolosha weligeed ah, 3:15
4. Mid kasta oo rumeeya Isaga uusan dhiman doonin, laakiin uu yeelanayo nolol weligeed ah, 3:16
5. Dhammaan ay murweeyaan Wiilka 5:23
6. -9. Yooxanaa 6:37, 39, 30, 45
10. Mid kasta oo I jeclaada oo I rumeeya ma dhiman doono weligiis, 11:26
11. Aniguna haddii kor layga qaado dhulka. dhammaan xaggaygaan u soo jiidi doonaa, 12:32
12. Mid kasta oo i rumaystaa uusan gudcurka ku sii jirin, 12:46

Tani waa mucjisada samaawiga ah (cf. aayadaha. 38-39; 17:2, 24 oo ka hor jeedda doorashada xorta ah). Labaduba si ahaan waa run. Ani ahaan ujeedka fiqi ahaaneed ee “axdiga” ayaa sida ugu fiican u mideeya ayaan odhan lahaa!

▣ **“oo rumaysta”** Xusuusnow in badbaadadu ay ugu horrayn tahay xidhiidh shaqsi ahaaneed, ma aha qodob caqiido ama madhab, fiqi sax ah, ama hab nololeed xagga hammiga ah (cf. 3:16; 11:25-26). Ujeedku waa rumaysadka qofka, ee ma aha weynaan ama awood. Ka eeg Mawduuc Gaar ah: 2:23.

Xusuusnow isu-dheelli tirka caddaynta ku aaddan doorashada samaawiga ah ee Ilaah sida ku jirta aayadaha. 37a, 39, 44, 65 iyo jawaabta aadanaha rumaysadkooda sida ku jirta aayadda 37b, 40. Xiisadaha Kitaabka Qudduuska ah waa waajin in la sameeyaa. Ilaah weynaantiisa iyo doorashada xorta ah ee aadanaha ayaa ah ujeeddooyinka mantaanaha ah ee axdiga baybal ahaaneed.

▣ **“uu nolosha weligeed ah lahaado”** kani waa fal taagan oo toosan oo xaalad muujinaya; jawaab ayaa la rabaa (cf. I Yooxanaa 5:11). Sidoo kale xusuusnow in aayadda. 39 ay tahay isku xidh guud, halka aayadda. 40 ay ka tahay mid shaqsi ahaaneed. Tan ayaa iska hor imaadyada badbaadada.

NASB (UPDATED) TEXT: : 6:41-51

⁴¹Sidaas aawadeed Yuhuuddu way gunuuneceen, maxaa yeelay, wuxuu yidhi, Anigu waxaan ahay kibista samada ka soo degtay. ⁴²Waxayna yidhaahdeen, Kanu miyaanu ahayn Ciise, ina Yuusuf, kaannu aabbihiis iyo hooyadiis naqaan? Hadda sidee buu u leeyahay, Samada baan ka soo degay? ⁴³Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku yidhi, Ha ka gunuunecina dhexdiinna. ⁴⁴Ninna iima iman karo hadduusan Aabbihiis i soo diray soo jiidin, aniguna maalinta u dambaysa waan soo sara kicin doonaa. ⁴⁵Waxaa ku qoran kitaabbadii nebiyada, Kulligood Ilaah baa wax bari doona. Mid kasta oo Aabbaha wax ka maqlay oo ka bartay waa ii yimaadaa. ⁴⁶Ma aha in nin arkay Aabbaha, kii Ilaah ka yimid mooyaane. Isagu waa arkay Aabbaha. ⁴⁷Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii i rumaystaa, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah. ⁴⁸Anigu waxaan ahay kibista nolosha. ⁴⁹Awowayaashiin waxay cidlada ku cuneen maannada, oo ay dhinteen. ⁵⁰Tanu waa kibistii samada ka soo degtay, in qof kasta cuno oo uusan dhiman. ⁵¹Anigu waxaan ahay kibista nool ee samada ka soo degtay. Haddii qof uun kibistan cuno, weligiis wuu noolaan doonaa. Oo kibistaan siin doonaa waa jidhkayga, nolosha dunida aawadeed.

6:41 “Sidaas aawadeed Yuhuuddu way gunuuneceen” Kani waa fal aan ebyanayn, oo tilmaamaya in ay marar badan oo badan ay bilaabeen in ay gunuunecaan ama ayba gunuuneceen. Xiisaddii ku warwareegiddii saxaraha lama degaanka ah (cf. Baxniintii iyo Tirintii.) ayaa arrintan sheegaya. Dadkii reer bnaii Israa’iil ee maalintaas sidoo kale way diideen Muuse, oo ahaa wakiilkii Ilaah, oo weliba u keenay ama siiyey cunto ay cunaan.

6:42 tan macnaheedu waxaa weeye in Yuhuuddu ay Ciise ereyadiisii ku saabsanaa isaga. Wuxuu si toos u adeegsanayey hadal sarbeebed ay Yuhuuddu leedahay si uu ugu muujiyo in uu yahay mid xaggaa Ilaah ka yimid oo horay u jiray! Yuhuudda ereyadoodu waa kuwo weli la yaab leh oo ku saabsan nijaar Galili ka yimid! Ciise qudhiisa ayaa sameeyay hadalkan la yaabka leh. Oo waa maxay! Isagu waa

1. Isagu waa Wiilka Ilaah ee qaatay jidhka aadanaha kaasoo nolosha weligeed ah ku keenaya ereyadiisa iyo camalladiisa
2. Dhexdhexaadiye been ah
3. Mid nacas ah (waxaa laga soo qaatay Josh Macdowell, buuggiisa *Evidence That Demands a Verdict*)

Ciise andacooshadiisu waa arrinta Masiixiyadda salka u ah

6:43 “Ha ka gunuunecina dhexdiinna” Kani waa fal taagan oo toos ah oo amar ah oo ay qayb diidmo ahi la socoto, kaasoo had iyo goor macnihiisu yahay in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray.

6:44 “Ninna iima iman karo hadduusan Aabbihii i soo diray soo jiidin” mar kasta Ilaah ayaa isla leh hindisaha (cf. aayadda. 65 iyo 15:16). Go’aannada ruuxigaq ah oo dhammi waxa ay ku yimaadaan baryada Ruuxa, ee ma aha habdiimeedka aadanaha (cf. Ishacyaah 53:6). Ilaah milkidiisa iyo jawaabta xadaysan ee aadanuhu waa kuwo si aan la kala saari karin ugu xidhan labadabaq doonista iyo naxariista Ilaah. tani waa ujeedkii Axdigii Hore ee axdiga.

Isla simidda midan “Aabbaha oo soo jiiida” waxaa laga helayaa 12:32 “isagaa aadanaha oo dhan xaggiisa u soo jiiida.” Soo jiidistani waxa ay dib ugu laabanaysaa tilmaantii saambalkii Axdigii Hore ee Ilaah dadkiisu ayan ka jawaabayn ereygii uu nebiyadda u soo dhiibay (tusaale ahaan: Ishacyaah 6:9-13; 29:13; Yeremyaah). Ilaah markan lama hadlayo reer Israa’iil isagoo nebiyo u soo marinaya, laakiin aadanaha oo dhan isagoo wiilkiisa u soo marinaya (cf. cibraaniyada 1:1-3). Ka eeg Mawduuc Gaar ah: diris (*Apostellō*) 5:24.

6:45 “Waxaa ku qoran kitaabbadii nebiyada” Tani waa xigasho laga soo qaatay Ishacyaah 54:13 ama Yeremyaah 31:34 taasoo caddaynaysa nolosha weligeed ah (qalbi cusub, maskax cusub) waa ujeedka “Axdiga Cusub.”

▣ **“Mid kasta oo Aabbaha wax ka maqlay oo ka bartay waa ii yimaadaa”** Waa wax aan macquul ahayn in lagu andacoodo Ilaah baan aqaan Ciise na la diido (cf. I Yooxanaa 5:1-12).

6:46 “Ma aha in nin arkay Aabbaha” Waxa Ciise u adag yahay ayaa ah in ninna uusan si run ah u fahmi karin una garan karin Ilaah in uu isaga u soo maro mooyaane (cf. Yooxanaa 1:18; 14:6.9). Xitaa Muuse si dhab ah uma uusan arag YHWH (cf. ka eeg ogaysiiska 5:32).

6:47 Aayaddani waxa ay soo koobaysaa deeqdii Ciise ee badbaadada xorta ah ee aadanaha oo dhan (“kii rumeeya” Fal taagan oo toosan oo is beddelay; “nolosha weligeed ah” cf. Aayadaha. 51, 58; 3:15, 16, 36; 5:24; 11:26; 20:31). Ciise waa badbaadada runta ah ee Ilaah, waa erridda keliya ee runta ah ee Ilaah (waa sida uu u socdo Injiilku, cf. 10:1-6, 7-9; 14:6), hase ahaatee tan wiilasha iyo gabdhaha ka soo farcamay aadan way heli karaan (waa sida uu u socdo Injiilku ee uu kaamil yeelayo cf. 1:4, 7, 12; 3:16; Bilowgii 3:15; 12:3).

6:50 Aayaddan, si la mid sida 31-35, ayey u tahay door ku aaddan macnaha kibista, kibista jidh ahaaneed (manna) iyo kibista samaawiga ah (Ciise). Mid ayaa bixiya oo waariya nolosha jidhka, laakiin waa in ay soo laablaabataa, oo xaqiiqdu waxa ay tahay in dhimasho aysan joojin karin. Kan kale ee bixiya nolol waarta, laakiin ay tahay in la aqbalo laakiin keenaya dhammaadka dhimashada ruuxa waa (xidhiidhkii Ilaah lala lahaa oo la jebiyo; oo xidhaadh saaxiibtinimo dhow lala yeesho dembiga iyo nafta).

6:51 “Anigu waxaan ahay kibista nool” kani waa mid ka mid ah hadalladii caanka ahaa “Anigu waxaan ahayn” ee Injiilka Yooxanaa (cf. 6:35, 48, 51). Waxa uu ahaa macne uu ciise ugu talo galay in uu diiradda ku saaro kan uu shaqsi ahaan yahay. Badbaadada, oo la mid ah muujin, ugu ambaynta waa shaqsi.

▣ **“Oo kibistaan siin doonaa waa jidhkayga, nolosha dunida aawadeed”** Tani waa tilmaan caddaynaysa in ciise nafahaantiisa, isagoo aan kibis caadiya oo la cunayo uusan ahayn, uu yahay tiir dhexaadka baahideenna. Weedhani waxa ay si cad ula xidhiidhaa oo ay dib ugu laabanaysaa 1:14.

NASB (UPDATED) TEXT: 6:52-59

⁵²Sidaa aawadeed Yuhuuddu way isla murmeen iyagoo leh, Kanu sidee buu jidhkiisa inoo siin karaa inaannu cunno? ⁵³Ciise haddaba wuxuu ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Haddaynaa jidhkii Wiilka Aadanaha cunin oo dhiiggiisa cabbin nolosha kuma lihidin gudhiinna. ⁵⁴Oo kii jidhkayga

cuna oo dhiiggayga cabba WUXUU leeyahay nolosha weligeed ah, oo maalinta u dambaysa waan soo sara kicin doonaa. ⁵⁵Waayo, runtii jidhkaygu waa cunto, dhiiggayguna runtii waa wax la cabbo. ⁵⁶Kii jidhkayga cuna oo dhiiggayga cabba WUU igu jiraa, anna waan ku jiraa isaga. ⁵⁷Sida Aabbaha nool ii soo diray, aniguna Aabbahaan u noolahay daraaddiis, sidaasaa kii i cunaa isaguna u noolaan doonaa daraadday. ⁵⁸Tanu waa kibista samada ka soo degtay, ma aha sida tii awowayaashiin cuneen oo ay dhinteen. Kii kibistan cunaa, weligiis WUU noolaan doonaa. ⁵⁹Waxyaalahaas ayuu sunagogga kaga dhex hadlay intuu Kafarna'um wax ku barayay.

6:52

NASB “doodeen”
NKJV “la murmeed”
NRSV “la murmeen”
TEV “Dood cadho ah”
NJB “doodis”

Fal waqtiyeedka aan dhammaysta dirnayn waxaa loola jeeday shay bilowgiis ama socoshada shay ama arrin waqti la soo dhaafay ah. Tani waa ereyga xagga Giriigga xooggan oo ku saabsan dagaalka (cf. Falimaha Rasuullada 7:26; II Timoteyos 2:23-24; Titos 3:9) tusaale ahaanna waxaa loogu adeegsada II Korintos 7:5 iyo Yacquub 4:1-2.

▣ “Kanu sidee buu jidhkiisa inoo siin karaa inaannu cunno” Sida ku jirta Yooxanaa Ciise waxa uu ku hadlayaa luuqad suugaaneed tilmaan ah taasoo had iyo jeer si qalad ah loo fahmo marka dareenka tooska ah loo tarjumo: (1) Nicodemos, 3:4; (2) Naagtii reer Sameeriya, 4:11; (3) Dadkii badnaa ee Yuhuudda, 6:52: iyo (4) Xertii, 11:11.

6:53-57 ereyada falka ah eek u jira aayadaha. 53 iy 54 waa kuwo xiiso leh. Asida ku jirta aayadda. 53, “cunis” iyo “cabis ” waxa ay ka hadlaysaa wax cajiib aho go’aan weyn labada fal ee ku jira aayadda. 54 ee “cuna” iyo “cabba” waa fal taagan oo toosan oo is beddelay oo xoojinaya ficil soconaya (cf. aayadaha 56, 57, 58). Tani waxa ay u muuqataa in ay xoojinayso run ah in ay waajib tahay in qofku uu ciise Masiix u yimaado marka koowaad oo uu sii wado in uu u jawaabo (cf. aaydada. 44).

Xasuuso in haddii ereyga suu yahay loo qaato hadalkan uu yahay isagoo si xun loogu qaatay sidii horror Yuhudi ah oo dhiigga cabaya (cf. Laawiyyiintii 17:10-14). Iyadoo la qaato Ciise tilmaamihiisii ku saabsanaa manna ee lama degaalkii dhexdiisa (cf. 58), iyo oo loo ostocmaalo sidii hadalku yahay ee la xidhiidha Euchrist waa waa koontaroolid xagga sida taariiqda isku soo haysato ah iyo iyadoo la lumiyo sida macnaha guud uu yahay ma ka tsrumayo.

6:54 “Jidh. . .dhiig” Tani waa hab tusaaleed ay Yuhuuddu leedahay oo la xidhiidha guud ahaan qofka, sida “qalbiga” oo kale.”

6:55 “Cunto run ah. . .cabis run ah”tani waa adeegsiga Yooxanaa dabecadda u ah ee ereyga runta (ka eeg Mawduuc |Gaar ah hoos). Yooxanaa qoraalkiisa dabadeed qoraalladii kale ee Axdigii Cusub waxa ay arkeen dabadeed waxa ay arkeen horumarka dhawra oo ku saabsan ku dhegganaantii waxyaabihii hore (caddayntii weynayd ee uu Yooxanaa Baabtiisuhu caddeeyay, iyo caddaynta weyn eek u aaddan waaq dhaaqa, iyo caddaynta weyn eek u aaddan aqoonta ama cilmiga aadanaha--Gnosticism).

MAWDUUG GAAR AH: “RUNA” (UJEEDEKA) KU JIRA QORAALLADA YOOXANAA

Dareen ahaan Yooxanaa waxa uu ku xidhan yahay asalka Cibraaniga iyo asalka Giriigga ee reyga runta *al theia* “tun” sidii uu ku sameeyey *logos* (cf. 1:1-14). Cibraaniga guduhiisa *emeth* (BDB-gu) waxa uu sheegayaa tan runta ah, ama runta mudan (haf iyo jeer waxa ay la xidhiidhaa Septuagint-ga *pisteuō*). Sida Giriigga ku jirta waxa ay la xidhiidhay Plato runtiisii ay ka soo hor been, samaawi uu ka soo hor jeedo waxa dhulku. Tan ayey ahayd kujiristii Yooxanaa. Ilaah si cad ayuu u muujiyey (barahsada ereyga *alētheia* oo ah in

in la caddeeyo, daboolka laga qaado, si cad loo muujiyo) Ilaah qudhiisa iyo Wiilkiisa qudhiisa. Tan dhowr qaab ayaa loo qeexay.

1. MAGAC, *alētheia*, run
 - a. Ciise waa mid ay nimco iyo run ka buuxdo (cf. 1:14,17 –AH ereyadii axdiga)
 - b. Ciise halka yoolkiisu yahay waa halkii uu Yooxanaa baabtiisuhu ka maqaati kacay. (cf. 1:32-34; 1; 18:37—Nebigii Axdigii Hore ugu dambeeyay)
 - c. Ciise runta ayuu ka hadlaa (cf. 8:4,44,45,46—muujintu waa mid meeleye iyo qof inataba ah)
 - d. Ciise waa waddada, runta iyo nolosha (cf. 14:6)
 - e. Ciise wuxuu iyag xaq kaga dhigay run
 - f. Ciise (*logos* 1:1-3) waa runta (cf. 17:17)
2. SIDE, *alēthēs*, run ah
 - a. Marqaati furkii Ciise (cf. 5:31-32; 7:18; 8:13-14)
 - b. Wax xukumidda Ciise (cf. 8:16)
3. SIFE, *alēhtinus*, dhan ah,
 - a. Ciise waa iftiinka runta ah (cf. 1:9)
 - b. Ciise waa kibista runta ah (cf. 6:32)
 - c. Ciise waa canabka runta ah (cf. 15:1)
 - d. Ciise waa marqaatiga runta ah (cf. 19:35)
4. FALKAABE, *alēthōs*, sida runta ah
 - a. Samariyiintu waxay Ciise ugu marag fureen in uu yahay badbaadiyaha adduunka (cf. 4:42)
 - b. Ciise wuxuu cunto iyo cabis run ah u yahay si la mid sidii looga soo hor jeestay manna-dii xilligii Nebi Muuse (cf. 6:55)

Eeyga run iyo qaababka uu u fal galo waxay ah sidoo kale caddaynayaan marqaati furro ku saabsan Ciise, *alēthēs*

- a. Marqaati furkii Yooxanaa baabtiisuhu waa run (cf. 10:14)
- b. Marqaati furkii Yooxanaa oo ah (qoraagii injiilkan) waa run (cf. 19:35; 21:24)
- c. Ciise oo loo arkay in uu yahay nebi run ah (cf. 6:14; 7:40)

Arrin cajiib ah oo ku saabsan runta ku jirta Axdiga Cusub iyo Axdigii Hore ka eeg George E. Ladd buuggiisa *Theologo of The New Testament*. Bogagga. 263-269.

6:56 “WUU igu jiraa, anna waan ku jiraa isaga” runtun iyada waxa ay sidoo kale ku jirtaa Yooxanaa 15:4-7; I Yooxanaa 2:5, 27, 28; 3:6, 24, ka eeg Mawduuc Gaar ah: Ku jiris I Yooxanaa 2:10. Waa caddayn Axdiga Cusub ah oo socota oo ku saabsan wanaagsanaanta kuw la subkay (cf. Galatiya 6:9; Muujintii 2:7, 11, 17, 26; 3:5, 12, 21, ka eeg Mawduuc gaar ah: 8:31). Jawaab jawaab run ahai waxa ay keenaysaa jawaab aan laga joogsi lahayn caddayntan ku aaddan ku adkaantu waa shayga ay gaadhsiiyayaasha ereyga ee Maraykanku la’ yihiin. Qofku waa uusan rumaysad oo qudha wax ka bilaabin, laakiin waa in uu rumaysad ku dhammeeyaa (cf. Cibraaniyada 11). Jonathan Edwards waxa uu yidhi “caddyanta runta ah ee doorashadu waa midda qofka sii wadda iillaa dhammaadka” W.T. Conner waxa uu yidhi, “Badbaadada ninka loo doortay badbaadada waxa ay ka timaaddaa nolol weligeed oo ku socota nolol weligeed ah oo ka timaadda maanka iyo ujeedka Ilaah, welise waxa ay ku xidhan tahay shuruuc rumaysad, oo ah rumaysad adkaan guul leh.”

6:57 “Aabbaha nool” Weedhani waa mid cajiib ah, laakiin ujeedkeeda waa lagu isticmaalay kitaabka. waxaa jira dhowr hab si weedhan loogu tafsiiro magaca Ilaah.

1. Magaca aasaaska ah ee Ilaah Axdiga (cf. Baxniintii 3:12, 14-16; 6:2-3, ka eeg Mawduuc Gaar ah: 6:20)
2. Axdiyada Ilaah, “sida aan u noolahay” ama magaca Ilaah dhexdiisa, “sida Rabbigu u nool yahay” (cf. Tirintii 14:21, 28; Ishacyaah 49:18; Yeremyaah 4:2)
3. Sida qeexid ku saabsan Ilaah (cf. Sabuurrada 42:2; 84:2; Yashuua 3:10; Yeremyaah 10:10; Daanyeel 6:20, 26; Hosheeca 1:10; Matayos 16:16; 26:63; Falimaha Rasuulada 14:15; Rooma 9:26; II Korintos 3:3; 6:16; I Tesaloniika 1:9; I Timoteyos 3:15; 4:19; Cibraaniyada 3:12; 9:14; 10:21; 12:22; Muujintii 7:2)
4. Hadalka ku jira Yooxanaa 5:26 ee ah in aabbuhu nolol leeyahay isaga ku ku jirta taasoo uu siiyey Wiilkaah iyo 5:21 halkaasoo odhanaysa in Aabbuhu uu kuwii dhintay sarakiciyey uu saas Wiilkuna sameeyo.

6:58 Kani waa is barar dhigga Axdigii Hore iyo kan Cusub, Muuse iyo Ciise. (Ka eeg kitaabka Cibraaniyada, gaar ahaan cutubyada 3, 4).

▣ “**awowayaashiin cuneen oo ay dhinteen**” Tani waxa ay sidoo kale u shaqaysay hadalkii fiqi haaneed ee diidistii badbaadada u soo maraysay faracooda (cf. 8:33-39) ama Sharcigii Muuse u soo maraysay ee (Tawreed).

▣ “**weligiis**” ka eeg Mawduuca Gaarka ah ee hoore.

MAWDUUC GAAR AH: WELIGII (OLAM)

Cilmiga barashada ereyga ee Cibraaniga *olam*, (BDB 761) waa mid aan la hubin (NIDOTTE, qaybta 3. Bogga. 345). Waxaa loogu isticmaalay dhowr nooc (iyadoo had iyo goor lagu go'aansanayo macnaha guud eek u jira). Kuwan soo socda waa tusaalooyin la soo xulay.

1. Waxyaabihii hore
 - a. Dadyow, Bilowgii 6:4; I samuu'eel 27:8; Yeremyaah 5:15; 28:8
 - b. Meel, Ishacyaah 58:12; 61:4
 - c. Ilaah, Sabuurrada 93:2 Maahmaahyadii 8:23; Ishacyaah 63:16
 - d. Shay, Bilwgii 49:26; Ayuub 22:15; Sabuurrada 24:7,9; Ishacyaah 46:9
 - e. Waqti, Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:7; Ishacyaah 51:9; 63:9,11
2. Waqri Mustaqbalka ah
 - a. Mid naftiis, Baxniintii 21:6; Sharciga Ku Noqoshadiisa 15:7; I samuu'eel 1:22; 27:12
 - b. Buunbuunintii Boqorrada, I Boqorrada 1:31; Sabuurrada 61:7; Nexemyaah 2:3
 - c. Jiritaan socda
 - (1) Dhulka, Sabuurrada 78:69; 104:5; Wacdiyaha 1:4
 - (2) Samada, sabuurrada 148:6
 - d. Jiritaanka Ilaah
 - (1) Bilowgii 21:33
 - (2) Baxniintii 15:18
 - (3) Sharciga Ku Nqshadiisa 32:40
 - (4) Sabuurrada 93:2
 - (5) Ishacyaah 40:28
 - (6) Yeremyaah 10:10
 - (7) Daanyeel 12:7
 - e. Axdigii
 - (1) Bilowgii 9:12,16; 17:7,13,19
 - (2) Baxniintii 31:16
 - (3) Laawiyiintii 24:8
 - (4) Tirintii 18:19
 - (5) II Samuu'eel 23:5
 - (6) Sabuurrada 105:10
 - (7) Isahcyaah 24:5; 55:3; 61:8
 - (8) Yeremyaah 32:40; 50:5
 - f. Axdigii gaarka ahaa eel ala dhigtay Daa'uud
 - (1) II Samuu'eel 7:13,16,25,29; 22:51; 23:5
 - (2) I Boqorrada 2:33,45; 9:5
 - (3) II Taariikhda 13:5
 - (4) Sabuurrada 18:50; 89:4,28,36,37
 - (5) Ishacyaah 9:7; 16:5; 37:35; 55:3
 - g. Masiixii Ilaah
 - (1) Sabuurrada 45:2; 72:17; 89:35,36; 110:4
 - (2) Ishacyaah 9:6
 - h. Sharciyadii Ilaah
 - (1) Baxniintii 29:28; 30:21

- (2) Laawiyiintii 6:18,22; 7:34; 10:15; 24:9
- (3) Tirintii 18:8,11,19
- (4) Sabuurrada 119:89,160
- (5) Ishacyaah 59:40:8
- i. Ballammadii Ilaah
 - (1) II samuu'eel 7:13,16,25; 22:51
 - (2) I Boqorrada 9:5
 - (3) Sabuurrada 18:50
 - (4) Ishacyaah 40:8
- j. Farcankii Ibraahim iyo dhulkii ballanqaadka
 - (1) Bilowgii 13:15; 17:18; 48:4
 - (2) Baqxiintii 32:13
 - (3) I Taariikhda 16:17
- k. Iidaha axdi ahaaneed
 - (1) Baxniintii 12:14; 12:14,17,24
 - (2) Laawiyiintii 23:14,21,41
 - (3) Tirintii 10:8
- l. Nlosa weligged ah ee waarta
 - (1) I Boqorrada 8:p13
 - (2) Sabuurrada 61:7-8; 77:8; 90:2; 103:17; 145:13
 - (3) Ishacyaah 26:4; 45:17
 - (4) Daanyeel 9:24
- m. Waxa sabuurradu ka sheegayaan in rumaystayaashu ay samayn doonaan weligood
 - (1) Mahad celin, sabuurrada 30:12; 79:13
 - (2) In ay ku jiraan xaadirnimadiisa, Sabuurrada 41:12; 61:4,7
 - (3) In ay aaminaan naxariistiisa, Sabuurrada 52:8
 - (4) In ay ammaanaan rabbiga, Sabuurrada 52:9
 - (5) In ay qasiidoyin Rabbi ammaan ah qaadaan, Sabuurrada 61:7; 89:1
 - (6) In ay caadilnimadiisa muujiyaan, Sabuurrada 75:9
 - (7) In ay aweyneeyaan ammaan magaciisa, Sabuurrada 86:12; 145:2
 - (8) In ay barakadeeyaan magaciisa, Sabuurrada 145:1
- 3. Markii horay I wado oo gadaal lo wado waqtiga labadaba (“waa mid weligiis waarid ka yimid weligiis waarisna u scda”)
 - a. Sabuurrada 41:13 (ku ammaana Ilaah)
 - b. Sabuurrada 90:2 (Ilaah naf ahaantiisa)
 - c. Sabuurrada 103:17 (jacaylka naxariista leh ee Rabbiga)

Xusuusnow macnaha guud ahaaneedi waxa uu ku siinayaa macnaha ereyga o salaysan ama fadhiya. Axdiga waara iyo ballamuhu waa shardi (i.e., Yeremyaah 7). Aad iyo aad uga taxaddar marka aad aqrinaysi habka cusub ee fiqiga ee aad la adeegsanaysid hadalladii Axdigii Hore. Axdiga Cudsubi wuxuu caam ama caalami ka dhigay ballammadii Axdigii Hore.

6:59 Ciise ficila ahaan wuu u sameeyey nidaamkii sharcigii Yuhuudda Maalmihiisii. Waxa uu ku bartay dugsiga sonagogga, sunagogga ayuu Ilaah ku caabudi jiray, oo sunagog ayuu wax ku baray. Wuu oofiyey waxyaabihii sharciga laga rabay oo dhan.

Sunagogyadu aasaas ahaan bilaabmeen qabsashadii Baabilyon (A. D. 605-538). Yuhuuddu waxa ay bilaabeen meelo caabudaad iyo wax baris oo gooni ah iyo meel kasta oo ay toban nin oo Yuhuud ah ku noqdaan. Kuwani waxa ay noqdeen kuwii hoddaha iyo dhaqankii Yuhuudda aadka ugu adkaaday. Markii ay Yuhuuddu ku soo laabteen Yahuudiya iyo adeegii macbudka xarumahan way sii abo qaadeen.

Nalooguma sheegin cutubka 6-aad markii Ciise Masiix uu galay Kafarna'um (cf. aayadda. 24).

NASB (UPDATED) TEXT: 6:60-65

⁶⁰Sidaa aawadeed xertiisii badidood markay maqleen, waxay yidhaahdeen, Hadalkaasu waa adag yahay. Yaa maqli kara? ⁶¹laakiin Ciise qudhiisu WUU oga in xertiisu taas ka gunuunacday, wuxuuna ku yidhi, Taas ma ka xun tihii? ⁶²Haddaba maxay noqon haddaad aragtaan Wiilka Aadanaha oo kor ugu baxaya meeshuu markii hore joogi jiray. ⁶³Waa ruuxa kan wax nooleeyaa, jidhkuse waxba ma taro. Erayadii aan idinkula hadlayna waxay yihiin ruux iyo nololba. ⁶⁴laakiin waxaa dhexdiinna jira qaar idinka mid ah oo aan rumaysan. Waayo, tan iyo bilowgii Ciise waa garanayay kuway ahaayeen kuwa aan rumaysan iyo kuu ahaa kii gacan gelin lahaa. ⁶⁵Markaasuu yidhi, Taas aawadeed waxaan idinku idhi, Qofna iima iman karo haddaan Aabbuhu awood siin.

6:60 “Sidaa aawadeed xertiisii badidood” Adeegsigan ereyga “xerta” waxa uu leeyahay tilmaamo ballaadhan. Sida ku jirta Yooxanaa ereyga iyo “rumayn” waxaa loo adeegsada labadaba (1) raacayaal runa ah (aayadda. 68) iyo (2) raacayaal ku meel gaadh ah (aayadda. 64, cf. 8:31-47).

▣ **“haqlay. . .dhegaysta”** door weyn ayaa ku jira ereyga “maqlid” (*akouō*). Ciise ereyadiisii ayey maqleen, laakiin maysan fahmin iyagii kamana aysan ficil celin. Markaan dareenkan eegno ereygan Giriigga ahi waxa uu u shaqeeyaa sidii kan Cibraaniga *Shema* (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 4:1; 5:1; 6:3.4; 27:9-10).

6:62 tani waa jumlad tilmaamaysa xaalad heerka koowaad ah oo aan wax dhammays tir ah lahayn. Tilmaantu waa way arki doonaan (cf. Falimaha Rasuullada 1). Kaddib Ciise dhimashadiisii/sarakiciddiisii/ku-laabashadiisii samada iyo imaatinkii Ruuxu, wax badan oo wax barisyadii Ciise iyo falimihiisii ka mid ahaa ayaa wax dareen ah u samayn lahaa iyaga.

▣ **“kor ugu baxaya meeshuu markii hore joogi jiray”** Tani waa caddayn sii socota oo ku began Ciise “oo samada hoos uga soo degaya.” Waxa ay ka hadlaysaa sidii uu horay ugu sii jiray ama jiritaankiisii hore ee la joogay Aabbaha jannada dhexdeeda iyo wehelnimada ku dhow ee uu Aabbaha kula leeyahay jannada (cf. 17:5, 24).

MAWDUUC GAAR AH: UBIXIDDII SAMADA

Waxaa jira tiro ereyo Giriig ah oo kala duwan oo loo adeegsaday Ciise bixiddiisii kore ee uu samada dib ugu laabtay.

Falimaha Rasuullada 1:2,11,22; *analambanō*, in kor loo qaado, (cf. I Timoteyos 3:16), sidoo kalena lagu isticmaalay Septuagint-ga II Boqorrada 2:9,11 ee Elishaah tarjumaaddisii ku aaddanayd samada iyo sidoo kale I Maccaabees 2:58

1. Falimaha rasuullada 1:9, *epairō*, in kor loo qaado, sare loo kiciyo, kor loo qaado
2. Luukos 9:51, *analēpsis* (qaabka #1)
3. *Diistemi*, in la duulo
4. Yooxanaa 6:62, *anabainō*, in samada loo baxo

Dhacdadan laguma dhex kaydin Matayos ama Injiilka Markos. Markos Injiilkiisu waxa uu ku dhammaadaa 16:8, laakiin mid ka mid saddexdii qoraal ee dambe ayaa dheeraadka ahaa waxa ay dhacdadan ku qeexayaan 16:19 (i.e., *analambanō*).

6:63 Aayaddan, sabab ka dhalatay macnaha guud ee ballaadhan ee cutubka 6-aad, waxa ay la xidhiidha kadhaa farqi u dhexeeya Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub, Muuse iyo Ciise (cf. aayadda. 58; II Korintos 3:6, ka eeg is badhbadh dhigyada axdiyada eek u jidha kitaabka Cibraaniyada).

▣ **“ruuxa kan wax nooleeyaa”** Tani waa mid ka mid weedhaha badan ee loo adeegsado Ciise iyo Ruuxa labadaba.

1. Ruuxu waa biyo nololsha bixiya (7:38-39)
2. Ciise waa biyaha nool (4:10-14)
3. Ruuxa Qudduuska ahu waa Ruuxa runta (14:17; 15:26’ 16:13)

4. Ciise waa runta (14:6)
5. Ruuxu waa dhexdhexaadiye (14:16, 26; 16:7)
6. Ciise na waa dhexdhexaadiye (I Yooxanaa 2:1)

Ka eeg Mawduuc Gaar ah: 14:16

Ogsoonow aayaddan dhexdeeda in “ruuxu” (*pneuma*) in labo hab oo qaas ah loo isticmaalay.

1. Ruuxa Qudduuska ah (cf. 1:32, 33; 3:34; 7:39; 14:17; 15:26; 16:13)
2. Ruux ahaan (cf. 4:24; 11:33; 13:21)

Yooxanaa 3:5, 6, 8 way adag tahay in la fahmo kan loola jeedo. In uu Yooxanaa noqdo, sida macquulka ah labadaba.

MAWDUUC GAAR AH: RUUXA (*PNEUMA*) KU JIRA AXDIGA CUSUB

Ereyga Giriigga ee “ruuxa” waxaa Axdiga cusub dhexdiisa loo adeegsadaa dhowr hab. Halkan waxaa ah bayaanno wakiil ah iyo tusaaleyaal.

A. Uu Ilaaha Qaaddirka ahu leeyahay

1. Ee ah Aabbaha (cf. Yooxanaa 4:24)
2. Ee ah Wiilka (cf. Rooma 8:9-10; II Korintos 3:17; Galatiya 4:6; I Butros 1:11)
3. Ee ah Ruuxa Qudduuska ah (cf. Markos 1:11; Matayos 3:16; 10:20; Yooxanaa 3:5,6,8; 7:39; 14:17; Falimaha Rasuullada 2:4; 5:9; 8:29,35; Rooma 1:4; 8:11,16; I Korintos 2:4,10,11,13,14; 12:7)

B. Xoogga nolosha aadanaha

1. Ee Ciise (cf. Markos 8:12; Yooxanaa 11:13,38; 13:21)
2. Ee aadanaha (cf. Matayos 22:43; Falimaha Rasuullada 7:59; 17:16; 20:22; Rooma 1:9; 8:16; I Korintos 2:11; 5:2-5; 7:34; 15:45; 16:18; II Korintos 2:13; 7:13; Filiboy 4:23; Kolosay 2:5)

C. Boqortooyada ruux ahaaneed

1. Ahaanshooyin ruuxi ah
 - a. Wanaag (i.e., malaa’igaha, cf. Falimaha Rasuullada 23:8-9; Cibraaniyada 1:14)
 - b. Sharka (i.e., jinka, cf. Matayos 8:16; 10:1; 12:43,45; Falimaha Rasuullada 5:16; 8:7; 16:16; 19:12-21; Efesos 6:12)
 - c. Cirfiidka (cf. Luukos 24:37)
2. Ciqaabta ruuxiga ah (cf. Matayos 5:3; 26:41; Yooxanaa 3:6; 4:23; Falimaha Rasuullada 18:25; 19:21; Rooma 2:29; 7:6; 8:4,10; 12:11; I Korintos 14:37)
3. Wayaabah ruuxiga ah (cf. Yooxanaa 6:63; Rooma 2:29; 8:2,5,9,15; 15:27; I Korintos 9:11; 14:12)
4. Hadiyadaha ruuxiga ah (cf. I Korintos 12:1; 14:1)
5. Waxyiga Ruuxa (cf. Matayos 22:43; Luukos 2:27; Efesos 1:17)
6. Jidha ruuxiga ah (cf. I Korintos 15:44-45)

D. Dabeecadda

1. Fikira adduunka (cf. Rooma 8:15; 11:8; I Korintos 2:12)
2. Hannaanka fakarka aadanaha (cf. Falimaha Rasuullada 6:10; Rooma 8:6; I Korintos 4:2)

E. Boqortooyada jidh ahaaneed

1. Dabaysha (cf. Matayos 7:25,27; Yooxanaa 3:8; Falimaha Rasuullada 2:2)
2. Neefta ama neefsashada (cf. Falimaha Rasuullada 17:25; II Tesaloniika 2:8)

Waa wax iska cad in ereygan uu u baahan yahay in lagu tarjumo iftiinka macnaha guud ee uu xambaarsan yahay. Waxaa jira hoosas kala duwan oo macna ah oo loo tixraaci karo (1) adduunka muuqda; (2) adduunka aan la arag; (3) si la mid ah sida dadka adduunka muuqda ama kuwa boqortooyada ruuxiga ah.

Ruuxa Qudduuska ahu waxa uu ku jiraa saddexda shaqsi ee Ilaah kaasoo si aad ah u maammula oo uga dhex shaqeeya masraxa taariikhda. Faca cusub ee Ruuxa ayaa yimid. Taas dhammaan way fiican tahay, oo waa qudduus, iyo run la xidhiidha Isaga. La joogistiisa, hadiyadihiisa, iyo adeeggiisuba waxa ay lagama maarmaan u yihiin qoto dheeraanta Injiilka iyo guusha Boqortooyada Ilaah (cf. Yooxanaa 14 iyo 16). Isagu wax dareen ah uma uusan bixin naftiisa, laakiin Masiixa (cf. Yooxanaa 16:13-14). Jeel ayuu u gala, wuu u qiraa dadka, wuu ku dhiirri geliyaa, oo wuu qaan gaadhsiiyaa rumaystayaal oo dhan (cf. Yooxanaa 15:8-11).

6:64 kooxahani way iska cad yihiin , laakiin raacayaasha beenta ah waxaa lagu soo yareeyay –Yuusad (cf. aayadaha. 70-71; 13:11. Waxaa jira yaab si run ah ugu jira heerarka rumaysadka.

MAWDUUC GAAR AH: APOSTASY (*APHISTĒMI*)

Ereygan Giriigga ah ee *aphisitēmi* waxa uu leeyahay boos balaadhan oo semantic ah. Arrintu se si kastaba ha ahaatee, ereyga Ingiriisiga ah “apostasy” waxaa laga soo qaatay ereygan waxaana ku daristeeda loogu danaynayey akhristayaasha casriga ah. Had iyo goor waa sida ay tahay, macnaha guud ayaa ah furaha, ma aha in qeexitaan la eego.

Waa erey isku xidhan oo ka yimid meeleeeye *apo*, oo macnihiisu yahay “ka yimid/ka timid” ama “ka fog” iyo *histēmi*, “in lagu fadhiisto,” “lagu istaago,” ama “in cayimo ama meel lagu ekeeyo.” Xusuusnow adeegisiyada soo socda ee aan (fiqiga ahayn):

1. In si muuqaal ahaaneed looga guuro
 - a. Macbudka, Luukos 2:37
 - b. Guri, Markos 13:34
 - c. Qof, markos 12:12; 14:50; Falimaha Rasuullada 5:38
 - d. Shayada oo dhan, Matayos 19:27,29
2. In loo guuro si siyaasadeed, Falimaha Rasuullada 5:37
3. In loo guuro si xidhiidh ahaaneed, Falimaha Rasuullada 5:38; 15:38; 19:9; 22:29
4. In loo guuro si sharci ah (furriin), Sharciga Ku Noqoshadiisa 24:1,3 (LXX) iyo Axdiga Cusub, Matayos 5:31; 19:7; Markos 10:4; I Korintos 7:11
5. In loo lacag qaam ah awgeed, Matayos 18:24
6. In la muujiyo in wax dan ah uusan lahayn tegitaanku, Matayos 4:20; 22:27; Yooxanaa 4:28; 16:32
7. In dan laga muujiyo in aan la guurin, Yooxanaa 8:29; 14:18
8. In loo oggolaado ama loo fasaxo, Matayos 13:30; 19:14; Markos 14:6; Luukos 13:8

Marka macnaha fiqi ahaaneed la eegana adeegsi balaadhan ayuu ereygan fal sameeyaha ahu leeyahay:

1. In la kansalo, ku celin, in la maro qabistii dembiga, Baxniintii 32:32 (LXX); Tirintii 14:19; Ayuub 42:10 iyo Axdiga Cusub, Matayos 6:12,14-15; Markos 11:25-26
2. In laga fogaado dembiga, II Timoteyos 2L19
3. In la dayaco iyadoo laga saarayo
 - a. Sharciga. Matayos 23:23; Falimaha Rasuullada 21:21
 - b. Rumaysadka, (Yexesqeel 20:8 (LXX); Luukos 8:13; II Tesaloniika 2L3; I Timoteyos 4:1; Cibraaniyada 2:13

Rumaystayaasha waqti casrigan waxa ay is weyddiiyaan su’aalo fiqi ah oo ah in qoraayaashii Axdiga Cusub aysan ahayn in marna ay fakareen. Mid kuwan ka mid ah waxa ay la xidhiidh sanaan lahayd dareenka casriga si rumaysadka looga sooco rumaysadka buuxa.

Waxaa shaqsiyaad ku jira baybalka oo ku lug lahaa dadka Ilaah oo ay wax dhacaan.

I. Axdigii Hore

- A. Kuwii maqlay labo iyo tobankii wax soo tebintii basaasiinta, Tirintii 14 (cf. Cibraaniyada 3:16-19)
- B. Qorax, Tirintii 16
- C. Wiilashii Ceelii, I Samuu’eel 2.4
- D. Saa’uul, I Samuu’eel 11-31
- E. Nebiyada beenta ah (tusaaleyaal)
 1. Sharciga Ku Noqoshadiisa 13:1-5; 18:10-22 (waddooyinka lagu garto nebiga beenta ah)
 2. Yeremyaah 28
 3. Yexesqeel 13:1-7
- F. Nebiyadaha beenta ah
 1. Yexesqeel 13:17
 2. Nexemyaah 6:14
- G. Hoggaamiyeyaashii sharka lahaa ee Israa’iil (tusaaleyaal)
 1. Yeremyaah 5:30-31; 8:1-2; 23:1-4
 2. Yexesqeel 22:23-31
 3. Miikaah 3:5-12

II. Axdiga Cusub

- A. Ereygan Giriigga ah waxa uu si toos ah u noqonayaa *apostasize*. Axdigii Hore iyo Kan Cusub

hadalladoodu waxa ay caddaynayaa si ay yihiin sharka iyo wax barista beenta ah Imaanshada Labaad ka hor (cf. Matayos 24:24; Markos13:22; Falimaha Rasuullada 20:29.30; II Tesaloniika 2L9-12; II Timoteyos 4:4). Ereygan Giriigga ah waxa uu ka tusaale bixinayaa ereyadii Ciise eek u jiray masaalkii carrada ee Matayos 13; Markos 4; iyo Luukos 8. Macallimiintan beenta ahu sida cad ma aha Masiixiyiin, laakiin waxa ay ka soo baxeen masiixiyiinta gudahooda (cf. Falimaha Rasuullada 20:29-30; I Yooxanaa 2:19); arrintu si kastaba ha ahaatee, awood ayey u leeyihiin in ay sasabtaan oo ay qabsadaan rumaystayaasha aan weli qaan gadhin (cf. Cibraaniyada 3:12).

Su'aasha fiqi ahaaneed waxaa weeye, miyey macallimiinta beenta ahu weligiid ahaayeen rumaystayaal? Tan aad ayey u adag tahay in laga jawaabo maxaa yeelay waxaa kaniisadaha deegaanka ku dhex jiray macallimiin been ah (I Yooxanaa 2:18-19). Inta badan waxaa su'aashan ka jawaaba hab dhaqankeenna fiqi ahaaneed iyadoo aan wax tixraac ah laga soo qaadanayn Baybalka (marka laga reebo in laga soo xiganayo qodob qeexan oo qoraal xigasho aayad laga soo qaadanayooo aan ku jidhin ama laga helayn wax macne la dhadhansan karo, haddii aan loogu talo gelin in mid loogu eexdo).

A. Rumaysad cad

1. Yuudas, Yooxanaa 17:12
2. Simon Magnus, Falimaha Rasuullada 8
3. Kuwii looga hadlay Matayos 7:13-23
4. Kwii looga hadlay Matayos 13; Markos 4; Luukos 8
5. Yuhuuddii Yooxamaa 8:31-59
6. Alexander iyo Hymenaeus, I Timoteyos 1:19-20
7. Kuwii I Timoteyos 6:21
8. Hymenaeus iyo Philetus, II Timoteyos 2:16-18
9. Demas, II Timoteyos 4:40
10. Macallimiinta beenta ah, II Butros 2:19-22; Yuudas aayadaha. 12-19
11. Kuwa Masiix ka soo hor jeeda, I Yooxanaa 2:18-19

B. Rumaysadka midho la'aanta ah

1. I Korintos 3:10-15
2. II Butros 1:8-11

Si dhifdhif ah ayaan qoraalladan uga fakarnaa sababta oo ah qaabka fiqiga (Calvinism, Arminianism) aqyaa faraha ku haya heerka ugu dambeeya ee jawaabta. Fadlan moray ha ii xukumina maxaa yeelay anigu waan soo saaray uun maaddada. Ujeedkaygu waxa uu ahaa in aan xeer soo saaro. Aan u daynno in Kitaabka Qudduuska ahu naf ahaantiisa nala hadlo si ay ugu qasin fiqiga. Tani sida badan way xanuun iyo argaggax badan tahay maxaa yeelay sida uu fiqiigeennu u badan yahay waa madhab, dhaqan, ama xidhiidh sida (waaalid, saaxiib ama wadaad kaniisadeed), ma aha mid baybal ahaaneed. Qaar ku dhex jira dadka laal ayaa baxaya in aysan ku sii dhex jirin dadka Ilaah (i.e., Rooma 9:6).

6:65 Tani waxa ay caddaynaysaa isla runta ku jirta aayadda. 44. Aadanaha guuldarraystay ama dhacay Ilaah hindisahooda u gaarka ah kuma raadin karaan Ilaah (cf. Rooma 3:9-18 oo ay la socdaan xigasho taxane Axdigii Hore ah kaasoo haddaynaya aadanaha dembi badnaantooda iyo fallaagonimadooda).

NASB (UPDATED) TEXT: 6:66-7:1 or 71

⁶⁶Taas dabadeed xertiisii intii badnayd dib bay uga noqdeen, oo mar dambe lama ay socon. ⁶⁷Haddaba Ciise WUXUU laba-iyto-bankii ku yidhi. Idinkuna ma doonaysaan inaad tagtaan? ⁶⁸Markaasaa Simoon Butros wuxuu ugu jawaabay, Sayidow, yaannu u tagnaa? Adigaa haya erayadii nolosha weligeed ah e. ⁶⁹Annaguna waa rumaysannay, waana og nahay inaad tahay Kan Qoduuska ah ee Ilaah. ⁷⁰Ciise wuxuu ugu jawaabay, Miyaanan idin dooran idinkoo laba iyo toban ah? mid idinka mid ahna waa cifriid. ⁷¹Wuxuu ka hadlay Yuudas ina Simoon Iskariyot, waayo, isaguu ahaa kan gacan gelin lahaa, isagoo laba-iyto-bankii ka mid ahaa.

6:67 “-iyo-tobankii” Tani waa adeegsiga ugu horreeya ee uu Yooxanaa ku adeegsanayo ee uu uga hadlayo erey caddad ah wax ku saabsan rasuullada (cf. 6:70, 71; 20:24). Ka eeg Mawduuc Gaar ah: 6:13.

6:68 “Simoon Butros wuxuu ugu jawaabay” Butros waxa uu ahaa afhayeelka labo iyo tobanka (cf. Matayos 16:16). Tani ma aha in loo qaato in hoggaamiyahooda yahay (cf. Markos 9:34; Luukos 9:46; 22:24).

▣ **“Adigaa haya erayadii nolosha weligeed ah”** Masiixiyadu waa labadaba (1) runta ku jirta farriinta, “ereyga nolosha weligeed ah, ” iyo (2) run lagu caddeeyay shaqsi, Ciise Masiix. Dabadeed, Injiilku, waa labadaba farriin iyo shaqsi ama qof. Ereyga *Pistis* labadaba waa uu noqon karaa (1) farriin (cf. Xaakinnada 3, 20) iyo (2) shaqsi (cf. Yooxanaa 1:12; 3:15-16). Ka eeg Mawduuc Gaar ah: 2:23.

6:69 “waa rumaysannay, waana og nahay” Kuwan labaduba waa fal ebyan oo toosan oo wax caddaynaya. Badbaadada sida ku jirta aayadda. 53 waa fal Aorist ah, waa fal tegay oo dhammays tirmay. Badbaadada ku jirta aayadaha. 40, 53, 54, 56, iyo 57 waa fal taagan, oo ah hannaan soconaya. Badbaadada halkan waa fal tegay oo macnuhu yahay waa la soo dhaafay, waa xaalad xasishay oo meel ahaansho ku degtay. Badbaadada runta ah waa ay ku jirtaa dhammaan fal sameeyayaasha Giriigga. Ka eeg Mawduuc gaar ah: hab ay fal ahaan ereyada Giriiggu u dhacaan ee lagu isticmaalay badbaadada 9:7.

▣

NASB, NRSV,

NJB

“Waxaa tahay Midka Qudduuska ah ee Ilaah”

NKJV

“Waxaa tahay Masiixa, Wiilka Ilaaha nool”

TEV

“Waxaa tahay Midka Qudduuska ah ee Ilaah ka yimid”

Halkan waxaa ka jirta dhibaato xagga qoraallada ah neeshan. Qoraalka gaaban (NASB, NRSV, NJB) waxaa tageeraya qoraalladii hore ee Giriigga P⁷⁵, N, B, C, D, L, iyo W. Qoraalladii dambe waxaa sida cad ku jira tilmaan ereyo dheeraad oo ah qirashadii Martha 11:27 ama Butros 16:16. USB⁴ waxa ay bixinaysaa qoraalka gaaban “A” isagoo ka caddaynaya (xaqiiq).

Weedha ah “Midka Ilaah ee Qudduuska ah” waa magac Axdigii Hore ah oo uu Masiixu lahaa. Waxaa lagu soo xigtay Luukos 1:35 iyo Falimaha Rasuullada 3:14. Waa magacii ay jinku ku timaameen Ciise markii ay isaga sheegayeen sida ku jirta Markos 1:24; Luukos 4:34. Ka eeg Mawduuc Gaar ah: I Yooxanaa 2:20. Tani waa hal qirasho oo kale oo ah rumaysadkii labo-iyo-tobankii, oo la mid ah sida ku jirta Matayos 16.

6:70 “Miyaanan idin dooran” Kani waa tusaale kaloo cad oo ku saabsan doorashada rabbaaniga ah ee xertii (cf. aayadaha. 44 iyo 45). Ogsoonow Ciise su’aashiisii ku jitay aayadda. 67. Doorashada rabbaaniga ah iyo doonista aadanuhu waa in ay ku hadhaan dulucda baybal ahaaneed. Waa labo dhinac oo xidhiidh axdi ah.

▣ **“mid idinka mid ahna waa cifriid”** alla muxuu hadal bilowgiis yahay. Ma aha tixraac ku saabsan xertii adadkayd oo laabatay (cf. aayadda 66), laakiin mid ka mid labo iyo tobankii rasuul ee la doortay eek u andacoonayey in uu rumaysan yahay isaga. Kuwo badani waxa ay middan la xidhiidhiyaan 13:2 ama 27. Waxaa jidha dhowr su’aalood oo la xidhiidha fahankeenna aayaddan: (1) Sababtee ayuu Ciise u doortay dhayddaan? (2) Maxaa ereyga loola jeedaa marka aan eegno macnahan guud ahaaneed ama dulucda?

Su’asha koowaad waxa ay ahayd saadaal wax sii sheegid ah (cf. 17:12; sabuurrada 41:9). Ciise waa uu ogaa wixii uu Yuudas samayn doonay. Yuudas waxa uu ahaa tusaalihii ugu dambeeyay ee dembiga aan la qaadi karin ama la rogi karin. Waa uu diiday kaddib markii uu maqlay, arkay, ee uu dhowr sano la joogay.

Su’aasha labaad labo macne oo macquul ah ayey leedahay

1. Qaar waxa ay tan la xidhiidhiyaan shaydaanka (waxaa la adeegsaday iyadoo aan erey qodobeed wax kala muujiya loo samayn loo adeegsaday shyddaanka sida ku jirta Falimaha Rasuullada 13:10 iyo Muujintii 20:2) geliddii Yuudas (cf. 13:2, 17)
2. Sida macquulka ah ereyga waxaa loo adeegsaday hab guud (ma leh qodob wax kala qeexa sida ku jirta I Timoteyos 3:11; II Timoteyos 3:3; iyo Tiitos 2:3)

Yuudas waxa uu ahaa dacweeye marka habkii Axdigii Hore loo eego, sida uu Shayddaankuba ahaa (ka ee Mawduuc Gaar ah 12:31). Ereyga Giriiggu waxa uu tilmaamayaa aflagaaddeeye ma mid saynta ku taagan. Ereyga Giriigga ahu waa uu isku xidhan yahay, oo wa “in gees-gees loo tuuro.”

6:71 “Simoon Iskariyot” waxa jira dhowr aragtiyood oo khuseeya ereygan (ereyga si kala duwan ayaa loo xaraf qoray oo loogu dhawaaqay qoraaqllada afka Giriigga). Wuxuu noqon karaa

1. Nin reer Korath ah, magaalo Yahuudiya ku taal
2. Nin Reer Kartan ah, magaalo Galiili ku taal
3. Kiishka haragga ah ee lagu isticmaali jiray in lagu qaado lacagta
4. Eryga Cibraaniga ah “ceejin”
5. Ereyga Giriigga ah oo ah middida shirqoolka

Haaddii #1uu run noqon lahaa wuxuu ahaan Yuusas ka keliy ee labo iyo tobanka ka midka ah. Haddii #5 ay noqon lahayd run wuxuu noqon lahaa Siiloot sida Simoon.

Waxaa jira boog dhawaan la qoray oo si aan diidmo ahayn uga hadla Yuudas. Buugga cinwaankiisa waxaa la yidhaa *Yudas, betrayer or friend of Jesus?* Ee uu Qoray William Klassen, fortress press, 1996. Dhibaataydaydu waxaa weeye in aan six eel dheer loo qaadan faallooyinka uu bixinayo Injiilka Yooxanaa.

▣ **“Gacan geliye”** ereygan Giriigga ah aad baa loo tarjumay macnihiisa guudna waa mid dhexdhexaad ah. Say doontaba ha ahaatee, waxaa lala xidhiidhiyey gacan gelintii uu Yuudas u gacan geliyey Ciise kuwa xukunka sare haysta, waxay qaadataa macne qofku lagu tilmaamo u yahay dembiile weyn. Ka eeg ogaysiiska 18:1.

SU’AALO FALAQAYN AH

Kani waa hage tafsiiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeena kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahaan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Falanqaynta Yooxanaa 6 ma waxay ku saabsan tahay cashada Rabbiga? Sabab? Ama sababtee ayaanay u ahayn?
2. Muxuu Ciise ku dooday marii uu yidhi, “waxaan ahayd kibista nolosha”?
3. Muxuu Ciise hafalkaa layaabka leh ugu jeediyey dadkii bdnaa?

YOOXANAA 7

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Rumaysad la'anta walaalahii Ciise 7:1-9	Rumaysad darada walaalaahi Ciise 7:1-9	Ciise,biyaha nolosha 7:1-9	Ciise iyo walaalahii 7:1-9	Ciise Yerusaaalem ayuu tagi jiray ciidaha wax ku bari jiray 7:1
Ciise iyo ciidii waababka 7:10-13	Aqoonyahanka samaawiga ah 7:10-24	7:10-13	Ciise iyo ciidii dugsiyada 7: 10-11 7:12-13	7:2-9 7:10-13
7:14-24		7:14-18 7:19-24	7:14-15 7:16-19 7:20 7:21-24	7:14-24
Kani Ciise miyaa? 7:25-31	Kani Ciise ma noqon karaa? 7:25-31	7:25-31	Isagu Masiixii miyaa? 7:25-27 7:28-29 7:30-31	Dadka ayaa falaanqeeyay asalahansha Masiixa 7:25-27 7:28-29 7:30
Saraakiil ayaa la diray si ay u soo xidhaan Ciise 7:32-36	Ciise iyo hoggaamiye yaahshii diinta 7:32-36	7:32-36	Ilaalo ayaa la diray si ay u xidhaan Ciise 7:32-34 7:35-36	Ciise waa sii adaroosay dhawaanshaha tagitaankiisa 7:31-34 7: 35-36
Wabiyada biyaa nool 7:37-39	Balanqaadkii Ruuxa quduuska 7:37-39	7:37-39	Iiladaha biyaha nool bixiya 7:37-39	Balanqaadka biyaha nool 7:37-38 7:39
Qaybsankii dadka dhexdooda 7:40-44	Kani waa ayo? 7:40-44	7:40-44	Qaybsankii dadka dhexdiisa 7:40-44	Daahfuro horle oo ku saabsan asal ahaansha Masiixa 7:40-44

Rumaysad la'aantii kuwii awooda sare lahaa	Waxaa diiday kuwii awooda sare lahaa		Rumaysad daradii Yuhuudii awooda sare laaha	
7:45-52	7:45-52	7:45-52	7:45	7:45-52
			7:46	
			7:47-49	
			7:50-51	
			7:52	

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-52

- A. Cutubyadan wada socda ee 5 iyo 6 waxay ku saabsanayiin Ciidii Kormarista.. kuwan kale ee wada socda ee 7:1 ilaa 10:21 waxa ku saabsanyiin cidii waababka. (7:2ff)
- B. Ciida waababku asaas ahaan waxuun bay ahayd xamdi naqii xiliga beergoyska (ee loo yaqaanay Ciida soo xeraynta. Cf. Baxniintii 23:16; 34:22) waxay sidoo kalena ahayd mid lagu xasuuto waayo aragnimadii xiligii Baxniinta ee (loo yaqaanay ciidii Kabbaha booths, cf Laawiyiintii 23:29-44 iyo sharciga ku noqoshadiisii, 16:13-15). Waxay dhacday 15kii bisha Tishri, oo ku began dabayaaqada bisha sebtember amaba horaanta bisha oktoobar.
- C. Cutubyada 7 iyo 8 waxay muujinayaan colaada ay wadaadadii sare ee Yuhuuda ay u hayeen Ciise' jabintii ciidi Sabbaat. (5:16) iyo sheegashadiisii uu sheegtay in uu ku Jiro YHWH- Ilaah(5:18). Ogaysiis inta jeer ee qoraaladan isku daygoodii
 1. Inay xidhaan isaga 7;1, 30, 32, 44, 10:39
 2. Inay dilaan isaga 7:1, 19, 25, 8:37;40 iyo (waliba 11:53

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 7:1-9

¹Waxyaalahaas dabadeed Ciise ayaa Galili ku dhex wareegay, waayo, ma u doonaynin inuu Yahuudiya ku wareego, maxaa yeelay, Yuhuuddu waxay doonayeen inay dilaan. ²Iiddii Yuhuudda oo tii waababka ahayd way dhowayd. ³Walaalihiis haddaba waxay ku yidhaahdeen, Halkan ka bax oo Yahuudiya tag in xertaadiina aragto shuqullada aad samaynaysid. ⁴Ma jiro nin si qarsoon wax u sameeyaa markuu doonayo in bayaan loo ogaado. Haddaad waxyaalahan samayso, dunida isu muuji. ⁵Xataa walaalihiis ma ay rumaysan isaga. ⁶Sidaa aawadeed Ciise wuxuu ku yidhi iyaga, Wakhtigaygu weli ma iman, laakiin wakhtigiinnu goor walba wuu joogaa. ⁷Dunidu idinma nebcaan karto, anigase way i neceb tahay, waayo, waxaan ka marag furaa in shuqulladeedu ay shar yihiin. ⁸Idinku iidda u kaca, anigu iiddan weli u kici maayo, waayo, wakhtigaygu weli ma dhammaan. ⁹Markuu waxyaalahaas iyagii ku yidhi, weli wuxuu sii joogay Galili.

7:1 “Waxyaalahaas dabadeed” tani waa ninadaam odhaaheed tilmaamaya calaamad aan aan aduunyo shaqo kulahayn.(5:1;6:1, 7:1;21:1)

☐ “Yuhuuddu waxay doonayeen inay dilaan” marka le eego Yooxan “Yuhuudu” waxay Ciise ka hayteen aragti xun oo shar ah (1:19;2:18;20;5:10;15:16;6:41;52:7;11;13;35;8:22, 52; 10:24;32;33;11:8; 19:7,

12:20:19).Dareenkooda nacaybka iyo qudhooyada ka dhnaka ahe Ciise waxay dhowr jeer ku qorantay (5:16-18;7:19, 30, 4459;10:31.33, 39;11:8;53).

7:2“liddii Yuhuudda oo tii waababka” waxaa kale oo waliba loo yaqaan ciida waababka (Laawiyyintii 23:34-44; Sharciga ku noqoshadiisii 16:13-17) waayo marka lagu jiro xiliga beergoyska dadka tuulooyinka degani waxay degayeen waababka yar yare e beerta ku dhex yaal, taasi oo xasuusin u ahayd waayo aragnimadii baxaaniintii dadka Yuhuuhda. Cadadan diimed waxay gundhig u tahay asalkii Ciise’ sida ka muuqata wax baristiisa ayadaha 7:1-10:21, sida uu ku sameeyay Ciidii Kormarista cutubka 5-6.

7:3 “Walaalihiis” tani waa markii kowaad ee la sheegay Ciise walalahii, marka laga yimaado 2:12. Waxa haddaba iska cad in aanay fahmin ujeedkiisa, nidaamkiisa iyo qorshahiisa toona.

▣ **“Walaalihiis haddaba waxay ku yidhaahdeen, Halkan ka bax oo Yahuudiya tag”** tani waxay tilmaamaysaa xajkii sannadlaha ahaa ee koox kooxda loo isu raaci jiray (Luukos 2:41-44) kuwaasi oo ka tagi jiray Galiili una kicitimi jiray Yereusaalem. Xasuusnow in Ijiilka Yooxaana xoogga saro shaqadii wacdinta Ciise.

7:4 “Ma jiro nin si qarsoon wax u sameeyaa markuu doonayo in bayaan loo ogaado” fiiri mawduuca

MAWDUUC GAAR AH: GEESINIMO (PARRĒSIA)

Weedhan dhafan ee afka Giriiga waxay tahay “dhammaan” (*pan*) iyo “ haddal” (*rhēsis*) madaxbaaninadan ama dhiiranaanta xagga haddalka waxay badiyaaba muujinaysaa geesinimo waloow ay jirto mucaaradnimo iyo diidmo ka dhan ahi(Yooxaana 7:13;1 Tesoloniika 2:2)

Qoraalda Yooxaana waxaa tani lagu isticimaaly (13 jeer) waxaay badiyaaba qeexaysaa bayaan rasmiya oo dadweynaha la gaadhsiiyay(Yooxaana 7:4; iyo waliba qoraaladii Bawlos, Kor.2:15)

Siday doonta ha ahaatee, waxay mararka qaar macnaheedu si fudud uga dhigan yahay “qayaxan” (Yooxaana 10:24,11:14,16:25,29)

Faaliimaha Rasuulada Bawlos waxaa uu uga hadlay fariinta ku saabsan Ciise,“dhiiranaan” si la mid ah sidii Ciise uga hadlay Aabbaha iyo qorshayaasha balan qaadkiisa (Faliimaha rasuulada 2:29;4;13;29;31;9:27-28;13:46; 14:3;18:26.19:8;26:26;28:31) Bawlos waxa kale oo uu waydiistay in loogu duceeyo sidii uu dhiiranaan ugu wacdin lahaa Injiilka. (Efiyaan 6:19; 1Tesoloniika 2:2) isla markaasna ugu noolaan lahaa Injiilka (filibooy 1:20).

Bawlos waxa uu ka rajeeyay Ciise in uu siiyo dhiiranaan iyo kalsooni si uu Injiilka ugu wacdiyo qarnigan sharka leh. (2 Kor.3:1-12). Waxaa kale oo uu kalsooni ku qabay in xerta ay si quman u dhaqmi doonan (2 Kor. 7:4)

Weedhahan waxaa ku jira arrin qoto dheer. Cimraaniyada waxay midani samaynaysaa macne weyn oo ah dhiirraanta uu Ciise kaga hadlay Ilaah iyo isagaba.(Cibraaniyada 3:6;4:16;10:19;35).Rumaystayaasha si buuxda ayaa loo aqbalay looguna soo dhaweeyay in ay xidhiish dhaw la yeeshaan Aabbaha iyagoo midan ku helaya wiilka dartiis.

Dhawr si yaalood ayaa loogu addeegsaday Axdiga cusub.

1. Kalsooni,dhiiranaan ama dammaanadqaad waxay la xidhiidhaa
 - a. Dadka (Falimaha Rasuulada 2:29,4:13;31; 2Kor.3:12, Efesos 6:19)
 - b. Ilaah (1Yooxaana 2:28;3:21,4:12,5;14;Cibraaniyada,3:6;4:16;10;19)
2. U hadlid si toos ah, cad ama aan gabad lahayn (Markos 8:32;Yooxaana 7:4; 13:10;24;11:14;16:25; Faliimaha Rasuulada28:31)
3. In uu ka hadlay fagaare dadwayne (Yooxaana 7:26;11:54;19:20)
4. Qaabkan la xidhiidha (*parrhēsiazomai*) ayaa la addeegsaday si loogu wacdiyo tiyoo xaalad qalafsani jirto (Falimaha Rasuulad 18:26; 19:8 Efesos 6: 20; 1 Tesoloniika 2:2) qoraalkani waxa uu tilmaamaya Kalsoonida soo noqosha labaad. Rumaysta yaashu kama cabsi qabaana soo laabashada danbe ee Ciise. Waxaay ku sugayaan farxad iyo rayn ray waayo Ciise ayay ku dhex noolyiin iyagana isagaa ku dhex nool.

khaaska ah ee soo socda.

▣ **“Haddii”** kani waa jumlad shuruudeed heerka koowaad ah kaasi oo run noqon kara marka laga eego arag

▣ **“doonayo in bayaan loo ogaado. Haddaad waxyaalahan samayso, dunida isu muuji”** Ciise yaa waxaa uu soo qaatay adeehisigooda ereyga “aduun” ayada 4 iyo 7 sid ku faaloota. Dunidu way necbaatay Isaga, balse

waxay u muujisay collaad. (cf 15:18;17;14; 1Yooxaana 3:13) waayo, waxuun ku marag furaa in shuqulladeedu ay shar yihiin. (19:20)

Ciise habka walalahii isgu muujiyay (i.e. mucjisaadku) aad abay uga duwanayeen jidka Ciise ee (iskutalaabat) tanina waxay ahayd wax sii sheegistii Ishacyaah 55:8-11 ayaa si cad u rumoobay!

7:5 “Xataa walaalihiiis ma ay rumaysan isaga.” tani waa faalo kale oo tafatiraysa hadalka qoraaga. Way kugu adkaan lahayd inaad Ciise u aqbasho inuu yahay Masiixa, marka isku xaafad ku korteen (Markos 3:20-21) Ciise waa uu danaynayay gabdhahii iyo wiilashii ay xagga jidhka walaalaha ka ahayeen. Qayb ka mid ah muuqashooyinkii Sarakicida ka dib waxay uu iga dan lahaa inuu isu muujiyo iyaga. iyagu rumaysteen isгаа (Falimaha Rasuulad 1:14)! Yacquubna waxa uu madax ka noqday Kiniisadii Yeerusaalem. Yacquub iyo ! Yacquubna waxa uu madax ka noqday Kiniisadii Yeerusaalem. Yacquub iyo Yuudasna waxa qoreen buugaatii xeerka Axdiga Cusub.

7:6 “**Wakhtigaygu weli ma iman,**” erayga “ wakhti”(kairos) waxaa halkan laga helaa kaliya (labo jeer) ayada 8 ee Injiilka Yooxaana iyo waraaqaha. BAGD

Waxa uu bixinayaa seddex macne oo aasaasi ah

1. – soo dhaweyn wakhti (i.e. II Korintos 6:2)
–xili habboon (i.e Luukos 4:13)
_xili cayiman (i.e Markos 13:33; Falimaha Rasuullada 3:20; I Butros 1:1)
2. Wakhti gaar ah ama xiisa leh
Wakhti gaar ah (i.e. Matayos 24:44; Luukos 1:20)
Wakhti buuxa (i.e Yooxaana 7:8, II Timoteyos 4:6)
3. Wakhti dhammaad adduun (i.e. Matayos 8:9;Luukos 21:8; Rooma.13:11; I Tesalonika 5:1; II Tesalonika 2:6)

Tirooyinka 2 iyo 3 waxay leeyiin macne dahsoon. Ciise waa fahansanaa shaqadiisa (12:23;13:1;17:1-5). Waxay lahayd wakhti rabbaani ah oo ku habboon in Injiilkan la furo (Luukos 22:22;Yooxaana 7:30; Falimaha Rasuullada 2:23;3:18;4:28).

7:7 “‘**dunidu**’ ka eeg maduuc gaar ah: Kosmos 14: 17

7:8

NASB

“laftiinu taga iida; anigu ma tagayo iida”

NKJV

“Idinku iidda u kaca, anigu iiddan weli u kici maayo”

NRSV, NJB

“idinka laftiinu taga iidan. Anigu iidan ma tagaayo ciidan”

TEV

“idinku taga iida. Anigu ma tagaayo iidan”

Dhawr ka mid ah qoraalada qadiimiga ah ee Giriiga (N, D, iyo K) malaha naxwe ahaan fal-kab ama falkaabe “walina” waxay u eegtahay in ay jireen isku dayo meesha lagaga saarayo is ka khilaafka u dhexeeya ayadaha 8 & 10. Naxwaha falkaabaha ahi waxa uu ku jiraa MSS P66; P75, B, L, T, iyo W (NK, JV, Axdigii Cusbaa ee qarnigii labaatanaad, NIV).

Hadalkan kooban waxaa loo fahmi kara sidan hoos ku xusan

NASB (UPDATED) TEXT: 7:10:-13

¹⁰“Markii walaalihiiis iiddii u kaceen, ayuu isaguna markaas xaggeeda u kacay, bayaan kuma tegin, laakiin sidii mid isqarinaya buu u tegey. ¹¹Yuhuuddu haddaba iidday ka dooneen, oo waxay yidhaahdeen, Xaggee buu joogaa? ¹²Dadkii badnaa aad bay uga gunuuneceen isaga, qaarkood waxay yidhaahdeen, Waa nin wanaagsan; qaar kalena waxay yidhaahdeen, Sidaas ma aha, laakiin dadkii badnaa ayuu khiyaaneeyaa. ¹³Haddaba ninna bayaan isaga ugama hadlin cabsiday ka cabsanayeen Yuhuudda aawadeed.”

1. Idinla tagi mayo (qorshahiina idinku raaci)
2. Waxaan tegeyaa baadhtamaha habeenka sideedaad ee iida (si aan u xuso calaamad iida)

7:11 “**Yuhuuda**” cutubkan waxa ku jira afar kooxood oo kala duwan oo la falgalaya Ciise.

1. Walaalahii
2. “Yuhuuda,” waa hoggaamiye yaashii diinta
3. “dadwaynahii,” waa ku sii jeeday socod koodii xajka ee iidii waababka

4. “dadkii reer Yeerusaalem, ” waxay ahaayeen dadkii deegaanka kuwaasi oo ka war hayay qorshahii ay gudigii wadaadada ee Sanhedrin la odhan jiray doonayeen in ay ku dilaan Ciise.

7:12 “Dadkii badnaa aad bay uga gunuuneceen isaga” tani waxay dhab ahaan muujinaysaa waxa uu Kitaabku markasta inooga sheego dadka meel isugu yimaada. Waxa kale oo ay muujinaysaa heerka fahanka awoodeed ee u dhexeeya binu aadmiga (7:40-44).

▣ **“dadka ayuu khiyaaneeyaa.”** Ereyga falka ah ee *planao waxa loo adeegsaday*

1. Macalimiin been ah (Matayos. 24:11; II Timatayos. 3:13, I Yooxaana 1:8; 2:66;3:7)
2. Masiixi been ah (Matayos 24: 4-5, 24; Yooxan dhexdiisa Yuhuudu waxay u haysteen Ciise (Yooxaana 12, 47, Matayos.27:63)
3. Dad naftooda khiyaanaynaya (I Korintos, 3:18; I Yooxaana 1:8) ama
4. La khiyaaneeyay (I Korintos. 6:9;15:33; Galaatiya 6:7, Yacquub 1:16 ereyga waxa lagu adeegsado meerayaasha, aan si joogto ah ugu wareegin udub wareega ururada xiddigahu raacaan.

Waxaa loo yaqaan “ iska heehaabte yaal”

7:13 “Yuhuuda” gabi ahaan dakii badnaa ee meesha joogay waay ahaayeen Yuhuud.midani waxay haddaba si cad tusinaysaa xeel dheerida uu Yooxaana u adeegsaday ereygan ku saansan hoggaamiye yaashii diinta ee

NASB (UPDATED) TEXT: 7:14-18

¹⁴ laakiin markay ahayd iidda dhexdeeda Ciise wuxuu u kacay macbudka, wax ayuuna ku baray. ¹⁵Joh Sidaa aawadeed Yuhuuddii ayaa la yaabtay iyagoo leh, Sidee baa kanu qorniinka u yaqaan isagoo aan weligiis baran? ¹⁶Joh Ciise ayaa haddaba u jawaabay oo ku yidhi, Waxbariddaydu tayda ma aha, laakiin waxaa leh kan i soo diray. ¹⁷Joh Haddii nin doonayo inuu doonistii Ilaah sameeyo, wuu garan doonaa waxbaridda, inay tahay tii Ilaah amase aan qudhaydu iska hadlayo. ¹⁸Kan qudhiisu iska hadlaa, ammaantiisuu doonaa, laakiin kan doona ammaanta kan soo diray, kaasaa run ah, oo xaqdarro kuma jirto.

Yeerusaalem. ka Eeg qoraal 7:1.

7:14 “laakiin markay ahayd iidda dhexdeeda” sababta dhabta ah ee Ciise u sugay ilaa xiligan maha mid cad, laakiin mid la sii qiyaasi karo ayaa ah in uu wakhti siinaayay in xujaajtii iyo dakii magaalada joogay wakhtu u helaan bal in wax iska wayddiyaan Ciise iyo shaqadiisa wacdinneedba.waxa kale oo waliba ay wakhti siisay hoggaamiyeyaashi diimeed ee Yuhuudu in ay banaanka u soo saaraa caddaawadii ay u hayeen isaga (ayaada13)

▣ **“bar”** dhacdooyinka Ciise ka hadlayay waxaa hagay

1. wax barid Matayos 4:23, 5:2, 19, IWM; Yooxaana 6:59;7:14, 28, 35;8:20, 28
2. wacdin Luukos 4:18;7:22;9:6;20:1

Halkan waxaa la bb marka la adeegsaday ay ku saabsantahay Runta Ciise ee Ilaah uu u soo diray dadka isga oo jidh binu aadan sita. Muujita badiyaaba waxaa macnaha ee loola jeeday in la sheego isbedela ay samayso. Waxay xambaarsantahay goaan qaadasho ah in la badalo hab nonololeedkii hore. Runtu wax kasta way bedeshaa!

7:15 “Sidaa aawadeed Yuhuuddii ayaa la yaabtay iyagoo leh, Sidee baa kanu qorniinka u yaqaan isagoo aan weligiis baran?” tani wuxuun bay si fudud u qeexaysaa inaanu ka qayb galin dugsiyadii ay la haayeen amaba aanu tacliimiin mid ka mid ah wadaadada magaca leh ay yaqaanaan. Adeegsiga eraygan “kani” waxay bixinaysaa macne dadban oo tixgalin daro ah. (18:17, 29).

Badiyaa Ciise wax bariistiisu way ka yaabin jirtay dhegeysta yaasha (Markos 1:21-22; Lukos 4:22) waayo (1) macnaha ay koobsato iyo (2) hanaanka, halka ay wadaadada diintu midba mid kale ka soo xigan jiray Ciise waxa uu ku andacooday in uu soo xigto Ilaah!

7:16 Ciise xooga muu saarayn kaliya is dhiibistiisa uu isu dhiibay (eeg qoraal 5:19) aabbaha balse waliba aqoon tiisa aan cid la wadaagta jirin ee uu u leeyay abbaha. Waxay lahaayeen waxbarasho adduunka la xidhiidha halka uu isagu ka watay wax baris samaawi ah.

7:17 “haddii” tani waa JUMLAD ODHAAHEED HEERKA SEDDEXAAD AH oo macnaheedu yahay fal suuro galnimo fal muhiim ah. Tani waa isburinta addunnyaada eek u xusan Injiilka (1:12;3:16) iyo saldanaada xukunka sare ee Ilaah (6:44;65) Ruuxu waa in uu furaa qalbiga (16:8:13).

7:18 Ciise waxaa uu carabka ku adkeeyay duwanaansha uu ka duwanayay binu aadmigii dhacay (1) ma doon doono murwayntiisa (2) wuxuu doon doonaa murwaynta aabbaha (3) waa run isagu waan (4) mid aan wax danbi ah Lahayn.

☐ **“ammaantii kan keliya”** ka eeg qoraal 1:14.

☐ **“wax xaqnimo daro ahi kuma jirin isaga”** Ciise waxaa uu u dhinatay danbiyadeena waayo uuma uu baahnayn in uu u dhinto danbiigiisa (II Korintiyos 5:21) danbi laanta Ciise waa qodob caqiido diineed ahaan ah muhiim . qodobkan badiyaa waxaa loo qeexaa siyaalo kala gadisan.

1. Lukos 23:41
2. Yooxaana 6: 69; 7:18;8:46; 14:30
3. Filiboy 2:7-8
4. Cibraaniyada 4:15, 7:26, 9:14
5. I Butrus 1 :19;2:22 (Ishacyah 53:9)
6. I Yooxaana 2:17;3:5, 7

NASB (UPDATED) TEXT: 7:19-24

¹⁹Sidaas aawadeed waxay ku yidhaahdeen, Aabbahaa xaggee buu joogaa? Ciise ayaa ugu jawaabay, garan maysaan, Aabbahayna garan maysaan. Haddaad i garanaysaan, Aabbahayna waad garan lahaydeen. ²⁰Haddalladaas ayuu kaga hadlay meeshii khasnaddu tiil intuu macbudka wax ku barayay. Oo ninna ma uu qaban isaga, waayo. saacaddiisii weli ma iman. ²¹Sidaas aawadeed wuxuu haddana ku yidhi iyaga, Waan tegayaa, waadna i doondooni doontaan, waadna ku dhiman doontaan dembigiinna. Meeshaan tegayo iman kari maysaan. ²²Sidaas daraaddeed Yuhuuddu waxay yidhaahdeen, Miyuu isdilayaa? waayo. isagaa yidhi, Meeshaan tegayo iman kari maysaan. ²³Wuxuu ku yidhi iyaga, Idinku waxaad tihiin kuwa hoosta, aniguse waxaan ka mid ahay kuwa sare. Idinku waxaad tihiin kuwa dunidan, aniguse mid kama ihi kuwa dunidan. ²⁴Haddaba waxaan idinku idhi, Dembiyadiinna waad ku dhiman doontaan, waayo, haddaynaan rumaysan inaan isagii ahay, dembiyadiinna ayaad ku dhiman doontaan.

7:19 dhismaha naxwe ahaan waxaa la filan karaa “haa” jawaab ah.

☐ **“laakiinse midkiina ma oofin sharciga”** tani waxay ku noqonysaa hadal naxdin leh Yuhuudi looga baahnaa inay ka qayb galaan Iidii Yeerusaalem.

Sharcigii Muuse waxaa uu si cad u madnuucaayay in gesysahsada shirqool fal dil ah, balse tani ayay ayad waxaa ay qorshaynayeen Hoggaamiyeyaashi diinta. Dadka deegaamku way ka warhayeen arrintan, hayeeshe may rajaynayn in ay joojiyaan ama ay ka muujiyaan wax cabasho ah.

☐ **“maxaad u doonaysaan inaad idshaan isaga”** suaasha aayada 20 ma aha mid ka timi hoggaamiyeyaashii diinta, balse waxay ka timi dadkii badnaa ee xujaajta ahaa, oo aan iyagu waxba kala socon shirqoolka Ciise loo maleegayo xagga dane ayaada 25 dadkii reer Yeerusalem way ogaadeen shirqoolka Ciise lagu dilayay. Waxa kale oo ay wadaadadii diintu ku eedeeyeen Ciise inuu Jiniyo qabo si ay cilad ugu raadiyaan wax wabistii iyo aragtiyahii Ciise (Matayos 9:34;11; 18; 12;12:24 Markos 3:22-30; Yooxaana 8:48-52;10:20-21).

7:20 “jinni ayaad qabataa” waxay ahayd mid u cadaanaysa qofkasta oo Ciise la kulamay in lahaa awood ruuxi ah. Suaashu wuunbay ahayd xaggee ayuu ka helay awoodan? Hoggaamiyeyaasha diinta ee Yuhuudu may dafuri karayn “calaamadaha/mucjisaadka” sababtaasi ayay haddaba ugu nisbeeyeen mid shaydaan uu ka helay (8:48-49, 52;10:20).

Macnaha halkan dadkii xujaajta ahaa ee joogay Iidii waababka waxay adeedsadeen ereyo la mid ah , laakin macne ahaan ka duwan. Waxaay carabka ku adkeeyeen Ciise u dhaqmaayo hab aan caqli gal ahayn oo khayaano ku salaysan.

MAWDUUC GAAR AH: JINIQABE (RUUX AAN DAAHIR AHAYN)

- A. dadyowgii hore waxay ahaayeen qaar aan Ilaah aqoon. Waxay u nisbayn jireen dabeecdaha shakhsi ahaaneed in ay saameeyaan xooga dabeecada, xayawaanka, iyo walxaha dabiiciga ah. Noloshu waxaa loo nibayn jiray waxyaala haasi la falgalaan binu aadmiga.
- B. Muqaalka noocan ah ayaa waxa uu keenay caabudaada (Ilaahyo badan) abdiyaa jinni qabe (*genii*) waxay ahaayeen ilaahyo yar yar ama ilaah-shaydaano (shar iyo wanaagba) saamayn kule noloshu aadanaha
1. Qalalaasahii iyo dagaaladii, Mosabotaaniya
 2. Nidaamkii iyo kala danbytii, Masar
 3. Kancaan, eeg W.F saahimintii ataartii iyo diimahii Israaiil ee Albright, daabaciisa, shanaad pp. 67-92,
- C. Axdiga hore wax saasi ah kama si sheego mawduuca ilaahyo yar ayar, malaaiig, jinni, sabatuna inay ahayd ku adkaansha uu ku adagyahay in la caabudi hal Ilaah kaliya. (Baxniintii 8:10;9:14;15:11; Sharciga ku noqoshadiisii 4:35,39;6:4;33:26;Sabuurada35:10;71:19;86:6 Ishacyac 46:9 Yeremiya 10:6-7; Mikah 7:18)ma ay sheegin ilaah beeneedyadii ay caabudi jireen ummadahii Cawaanka ahaa (Shedim, Sharciga kunoqoshadiisa 32:17; Sabuurada 106:37 wuxuun bay magacoday qaar ka mid ah iyaga
1. Seim (dhogor ama shaydaan gas leh, Laawiyiintii 17:17 II Korintiyas 11:15)
 2. Lilith (dhedig, shaydaan dareen soo jiidasho leh Ishacyac 34-14)
 3. Mavet (erey Cibraani ah oo loo adeegsaday dhimashadii ilaahii reer kancaan ee dunida hoosteeda, Mot Ishacyaac 28:15;18; Yeremiya 9:21; iyo suurogal ahaan Sharciga kunoqoshadiisa 28:22)
 4. Resheph (halaag Sharciga ku noqoshadiisa 33:29; Sabuurada 78:48; Xabaquq 3:5)
 5. Dever (dilaa ah, Sabuurada 91:5-6; Xabaquq 3:5)
 6. Az'azel (magic aan l hubin, balse noqon kara shaydaankii lama degaanka ama meel magaceed, Laawiyiintii 16:8,10,26).
- Tusaale yaashan waxaa laga soo qaatay Encylopaedia Judaic, vol. 5, p, 1523)
- Siday doontaba ha ahaatee ma jiraan wax awoodao shaydaan ama malaaiigeed oo ka sareeya YHWH Axdiga hore dhexdiisa. (Ayub 1-3; Sakariya 3) ma aha mid si madaxbanaan ama, cadow iskiis isu hagaya (A.B. Davidson waxbaristiisa diimeed eek u saabsan Axdiaga hore,pp.300-306)
- D. Juudaismku waxay soo ifbaxday xiligii Baabuloon loo kaxaystay (586-538 ee C.H) waxay ahayd wax barsi Caqiido diineed oo ay samayn ku yeesheen Beershiyuunta Ilaah beeneedyo ama shaydaan caabdud ku salaysan, ilaah sare oo la odhan jiray Mazda ama ormasd oo ay ishayaan shaydaan isna la odhan jiray Ahriman.
- Tan ayaa gayaysiisay Juudaismkii ka danbeeyay kaxaysadkii Baabuloon in isku qasaan YHWH iyo malaaiigahiisa, iyo shaydaanka ama malaaiigtiisa ama shaydaanka. Barashada caqiidada Juudaism sawirka laga bixiyay Sharka waxaa si fiican u qeexay kuna qoray Alfred Edersheim buugiisii uu gu magic daray Noloshii iyo wakhtigii Ciise Masiix, tirsgiiisa 2 qaybtiisa XIII (pp.749-863) iyo XVI (pp.7700-776) seddexdan qaab ayay Juudaism u dhigtaa sharka
1. Shaydaan ama Sammael
 2. Ujeedka sharka ah (*yetzer hara*) ee dadka dhexdiisa
 3. Dhimashada Malaga
- Edersheim waxaa uu tanu u dhigay (1) eedeeyaha (2) Jirabaha (3) ciqaabaha (vol 2,P. 756). Waxaa u dhexeeyaa farqi muuqda habka uu sharka uga hadlo Juudaismkii ka danbeeyay xiligii kaxaysadka iyo sida uu u dhigo Axdiga Cusubi
- E. Axdiga Cusub, khaastan Injiilada ayaa waxay sheegayaan jiritaanka shaydaanka iyo inuu markasta kazoo horjeedo ruux ahaan dadka iyo YHWH (Juudaismka marka la eego Shaydaanku waxa uu yahay

cadowga dadka balse Ilaah maaha) waxay ka horyaamdeen doonista ilaah iyo xukunkiisa boqortooyada .

Ciise oo si toosa ay isaga horyimaadeen, oo eray shaydaankaas, waa uu ugu yeedhay(1) Ruuxa wasakhda ah (Lukos 4:36;6:18) ama (2) (Ruuxa sharka leh Lukos 7:21;8:2) ee ka yimaada dadka. Ciise si cad ayuu u kala saaray farqiga u dhexeeya bukaanada (jidhka iyo maskaxda iyo jinni qabida) waxaa uu muujiyay awoodiisa ruux ahaaneed isagoo aqoonsaday oo saaray ruuxayada sharka leh. Badiyaa way garan jireen isaga, waxayna isku dayijireen inay u qudbadeeyaan, laakiin Ciise waa diidi jiraymarkhaati furkooda, waanu aamusin jiray oo saari jiray. Jini saaristu waa calaamado muujinaya in laga guulaysaty boqortooyada shaydaanka.

Marka la eego haddaba waraaqaha Rasuuladae Axdiga Cusub, waxa jirta arrib yaab leh oo ah sida aan looga warhayn arrinta mawduucan. Shaydaan saarista waligeed looma diiwaan galin sidii hadiyad ruuxi ah, ama waxbaris diimeed, ama hannaan, la looga faaiidayn karo shaqad wacdineed rumaystayaahsa faca iman doona musaqbalka

- F. Shayrku waa mid run ahaan jira; sharku waa mid shakhsi ah, sharku waa mid wakhti xaadirkan jooga. Asalkeedii iyo qorshaheeda toona la muujinkitaabku wuxuu si xoogle u sheegaa jiritaankeeda kana soo horjeedaa saamyntiisa. Run ahaana ma jirto awood uu shaydaanku leeyay talada kama danbaysta. Ilaah ayaa xukunka gacanta ku haya. Shaydaanka waa laga guulaysan doonaa waana la xukumi doonaa lagana qaadi doonaa abuurka
- G. Dadka ilaah waa inay iska caawiyaan sharka (Yacquub 4:7) isagu ma xukumi karo (1Yooxaana 5:18) laakiin wuu jirabi karaa oo wax yeelayn karaa maragfuryadooda (Efasos 6:10-18). Sharka waxaa lagu shaaciyay qayb ka mid aragtida dunida Masiixiynta ah. Masixiyiinta casrigani xaq uma laha inay dib u qaabeeyaan qeexida shaydaanka. (wax baristii ku saabsanyd shaydaan ka saarista ee Rudolf batman) qofnimo ka qaadida sharka qaab dhismeedkii bulsho ee Paul Tillich) amaba isku dayo lagu sharaxayo erayo nafsaani ah (Sigmund Freud) saamayntiisa iyo boorintiisa ,balse laga adkaaday. Rumaysteyaasha waxaa laga rabaa in ay ku socdaan guusha Ciise soo hooyay.

7:22

NASB, NKJV “(Sidaa aawadeed Muuse wuxuu idin siiyey gudniinta (kamana iman Muuse, waxayse ka timid awowayaashii”

NRSV “(dhab ahaantii, kamayna iman Muuse, balse odayadiinii”

TEV “(waloow ayna Muuse ka iman waa kuwaad ka soo farcanteen kuwa bilaabay ”

NJB “__ maaha in ay isaga la bilaaban tay, waxay dib ugu laabataa odayadiinii ”

Caadada diimeed ee gudniinku lamay bilaaban sharicga Muuse (Baxniintii 12:24; Laawiyiintii 12:3), laakiin waxaa YHWH Ibraahim u siiyay calaamad ahaan axdiga khaska ah ee uu la galay (bilowgii 7:9-14;21:4;34:32).

▣ “**idinku sabtida ayaad nin guddaan.**” Nuxurka dooda Ciise waxay ahayd iyaga oo rajaynaayay in ay dhinac isaga dhigaan xeerarkoodii Sabtidhowrista si ilmo loo gudo.(*shab*132a; *sabh.* 18:3;19:1-6), balse aan rajaynayn in ay dhinac iska dhigaan xeerarkii Sabtidhowrsita si qof dhan la bogsiiyo. Waxaa haddaba muhiim ah in qaybahan oo dhan Ciise adeegsanay haddalo macquul ah oo qaab ahaan ah sharigii ay Yuuhuuda.

7:23 “**haddii**” tani naxwe ahaan waa jumlad shuruudeed heerka kowwad ah una dhow run marka laga eego aragtida qoraaga ama qasdiga qoraal sugaaneed ahaan.

▣ “**ma waxaad iigu cadhoonaysaan nin aan dhammaantiis Sabtidii bogsiiyey?**” tani waay ku saabsantahay midood bogsiiintii Ciise sameeyay sida ku qoran 5:1-9 amaba bogsiin kale oo qornayn oo uu sameeyay intii lagu jiray Iida.

Ereyga afka Giriiga “cadho” (*cholaō*) waa mid qariib ah oo halkan oo kaliya laga helo Axdiga Cusub. Waxaa laga helaa sugaanta Giriiga o dhan(BAGD, P.883 iyo MM, p. 689). Waxay xidhiidh la leeday erayga “xanaaq” (*cholē*, cf. Matayos 27:34) sababta uu Ciise u isticimaaly eraygan (i.e macnaha guud) ma cadda. Laga yaabee inay qeexayso “cadho rabbaani ah” macne ahaan iyagoo moodaya inay difaacayaan Ilaahay doonistiisa iyo sharcigiisa, oo Ciisena ku xadgudnayo.

7:24 “Aragtida waxba ha ku xukumina, laakiin ku xukuma xukunka xaqa ah” kani naxwe ahaan waxa weeye faltaagan oo toos ah xagga danbena diidmo amareed ka ah, taasi oo macnaheedu yahay joojiya fal markaa socda. Waxaa raacday AORIST AMAREED, oo sarbeebaysa degdegsimo. Laga yaabe, tani in ay tixraac u tahay Ishacyaah 11:3.

NASB (UPDATED) TEXT: 7:25-31

²⁵Sidaa aawadeed qaar ka mid ah kuwa Yerusaaalem waxay yidhaahdeen, Kanu miyaanu ahayn kay doonayaan inay dilaan? ²⁶Bal fiiriya, bayaan buu u hadlaa, waxbase kuma yidhaahdaan. Taliyayaashu runtii ma og yihiin inuu kanu yahay Masiixa? ²⁷laakiin kani meeshuu ka yimid waannu og nahay, markuuse Masiixu yimaado, ninna garan maayo meeshuu ka imanayo. ²⁸Ciise haddaba macbudkuu ka dhex qayliyey isagoo wax baraya oo leh, Waad i taqaanniin, waana og tihiin meeshaan ka imid; anigu qudhayda kuma aan iman, laakiin kii i soo diray waa run, kan aydnaan garanaynin. ²⁹Anigu waa aqaan, waayo. isagaan ka imid, wuuna i soo diray. ³⁰Sidaa aawadeed waxay dooneen inay qabtaan, laakiin ninna faro ma uu saarin, waayo, saacaddiisii weli ma iman. ³¹laakiin qaar badan oo dadkii ahi way rumaysteen, waxayna yidhaahdeen, Masiixu markuu yimaado miyuu samayn doonaa calaamooyin ka badan kuwii kanu sameeyey?

7:25 “Kanu miyaanu ahayn kay doonayaan inay dilaan?” suaasha qaabkan ahi naxwe ahaan waxaa la filan karaa “haa” jawaab ah (cf. 5:17;7:19). Tani waxay ugu horaysaa suaalo taxane ah oo ku jira aayaada 36.

7:26

NASB, REV,

NET “Bayaan buu u hadlaa”

NKJV “Si geesi nimo leh ayuu u hadlaa”

NRSV, NJB “si furan ayuu u hadlaa”

Ka eeg mawduuc gaara: geesinimo (*parrhēsia*) 7:4

▣

NASB “miyaanay runtii taliyayaashu ogayn kanu yahay Masiixa, miyaa?”

NKJV “Taliyayaashu runtii ma og yihiin inuu kanu yahay Masiixa?”

NRSV “miyaanay runtii taliyayaashu ogaan Karin in kani yahay Masiixa?”

TEV “miyaanay runtii ogaan kareen in uu yahay Masiixa?”

NJB “ma runnoobi kartaa in xukun hayeyaashu garan kari waayaan in kani yahay Masiixa?”

Naxwa dhismeedkan waxaa la filan karaa (maya) jawaab ah. Hase ahaatee, waxay muujinaysaa suurto galnimo (1:31;4:29)

7:27 “kani meeshuu ka yimid waannu og nahay, markuuse Masiixu yimaado, ninna garan maayo meeshuu ka imanayo.”tani waxay ka hadlaysaa Masiixa wadaadada diintu filayeen sid ku xusan Malaakii 3:1 oo ah in Masiixu si kadis ah uga dhex muuqan doono macbudka. Tani waxaa laga heli karaa Heenok 48:6 iyo IV Cesraa 13: 51-52.

7:28 aayadan Ciise waxaa uu ku sheegay laba hadal.

1. In Ilaah soo diray isaga(3:17, 34; 5:6, 38; 6:26; 7:29; 8:42; 10:36; 11:42; 17:3, 18, 21, 23, 25; 20:21).

2. Inaanay iyagu Ilaah aqoon(cf. 52:37, 42;8:19, 27, 54-55;16:3)

Yooxaana waxa uu qoray in Ciise “qayliyay” (7:37; 12:14;Matayos 8:29). Ciise codkiisa kor ayuu u qaaday si loo maqlo. Macne ahaan, tani waxay hadal ahaan u shaqaysaa sidii Ciise bilowgii isticimaalay “Aamiin” ama “Aamiin, Aamiin” waxaa uu doonaay in hadaladan calculus muhiimadood sheego! Aayada 29 waay sheegaysaa dhibaataada! Waxay u malaynayaan in uu Isagu ka yimi Galili (aayada 41) laakin, run ahaantii waxa uu ka yimi Samada!

▣ “kan i soo diray waa run” Aabbuhu waa run (cf. 3:33; 8:26; I Yooxaana 5:20) sidaasi awgeedna Wiilku (cf.7:18;8:16).ka eeg Mawduuc Gaar ah: 6:55

7:29 “Anigu waa aqaan, waayo. isagaan ka imid, wuuna i soo diray.” Marka la eego Yooxaana tani waa tusaale kale oo xariiq toosan ku ah caabudaada wax ka badan Hal. Hadalkan oo kale wadaaddadii Yuhuudu waxa uu la ahaa Ilaah iyo diintiisa oo la caayo, waxayna waafajiyeen baahida keentay in ay dilaan Ciise. Ka eeg mawduuc gaar ah: dirid (*Aposteloo*) 5:24.

7:30 “waxay dooneen inay qabtaan” Kani waa naxwe ahaan jumlad fal kala dhiman, maldahaysana (1) waxay bilaabeen doondoontiisa si ay qabtaan (2) waxay isku dayeen marar badan sidii ay u xidhi lahayeen laakiin may rabin in kacdoon ka dhex ridaan dadkii xajka joogay ee Isaga u rumaysatay inuu yahay Masiixa.

▣ **“waayo, saacaddiisii weli ma iman.”** Tani waa sarbeeb wax sii sheegis soo noqnoqonaysa, oo carrabka ku adkaynaysa jadwalka rabbaaniga ah (cf. 2:4; 7:6, 30; 8:20; 12:23, 27; 13:1; 17:1).

7:31 “laakiin qaar badan oo dadkii ahi way rumaysteen” Waxay ka dhigeen si buuxda ayay ula yimaadeen rumaysad ay rumaysteen, wallow ay fikir qaldan ka hayteen hawlgalkiisa Masiixnimo. Qofna malaha “iimaan kaamilan” (Nuux, Ibraahim, Muuse, Daauud, Labo iyo tabankii)/ ke eeg mawduuca gaar ah 2:23

Tani badiyaaba way dhacdaa marka Injiilka la soo bandhigaayo. Qaar way ruaysaan, qaar way shakiyaa, qaarna way ka cadhoodaan. Bartan ayaa ah bar kulanka macnaha qarsoon ee layaabka leh ee

1. Doorashada rabbaaniga ah
2. Dabiilenimad dadka

Halkan waxaa ah ariin macne dahsoon oo yaable leh. Badiyaa waan naxaaa rumaysad darada halkaasi ka jirta tiyoo ay arkaan iftiinkaasi aad ka u badan. Tani waa asalka ereyadii Ciise ee ku saabsanaa in qoys dhexdii mid ba midka kale ka hor jeedsandoon. Injiilku qaar waxa uu u keenaa nabad, qaar kalena colaad!

▣ **“waxayna yidhaahdeen, Masiixu markuu yimaado miyuu samayn doonaa calaamooyin ka badan kuwii kanu sameeyey”** naxwe ahaan marka la ee qaabka erayga afka Giriiga waxaa la filan karaa “maya” jawaab.

Barashada diimeed ee Axdiga Cusub, George E. Ladd ayaa ka bixiyay faalo xiiso leh “calaamooyin” si ii ugu dhiiri galiyo rumaysadka Ciise:

“suaasha xidhiidhka calaamooyinka iimaanku maaha mid sahlan, waayo xogta ayaa u muuqata mid laba jiho oo kala duwan leh. Mararka qaar calaamadaha ayaa waxay u samaysanyiin kuwo horseedaya in la rumaysto Ciise (2:23 6:14; 7:31; 10:42”) dhanka kalena, waxaa jira, in aan kuwa calaamadaha arkay ayna rumaysan (6:27; 11:47; 12:37) waxaa kale oo ay ah mar uu Ciise ku canaantay Yuhuuda in aanay rumaysan doonin ilaa ay arkaan calaamooyin (4:48;6:30). Jawaabta la helayaa waa in ay ahaataa hadaba mid xiisad ku dheehanatay u dhexaysa calaamooyinka iyo rumaysadka. Waxay u baahantahay rumaysad in la garto macnaha dhabta ah ee calaamooyinka iyo markhaatufirkooda Ciise; kuwa aan rumaysad ka la iman, calaamooyinku wuxuun bay u ahaanayaan, sawir aan macno lahayn. Kuwaa rumaysadka si wanagsan uga jawaabay, waxay u yihiin calaamooyinku qaar macno buuxa u samaynaya siina xoogaynaya rumaysadkooda. Way caddahay in aan calaamooyinka Ciise qasab ku keenayn rumaysad. Dhinac kale calaamooyinka Ciise waxay u ugu filanyiin markhaatufur kuwa awooday in ay arkaan waxa ka dhex socda hawl galadiisa. Shuqulada Ciise waxay u ahaan doonaan cambaarayn kuwa iyo xaqiijin aadamiga danbiyadooda indho la, aanta ah”. (p.274)

NASB (UPDATED) TEXT: 7:32-36

³²Farrisiintu way maqleen dadkii badnaa oo ka gunuunucayay waxaas ku saabsanaa isaga, wadaaddadii sarena iyo Farrisiintii waxay u direen saraakiil inay soo qabtaan isaga. ³³Ciise haddaba WUXUU ku yidhi, Weli in yar baan idinla joogayaa, markaasaan u tegayaa kii i soo diray. ³⁴Waad i doondooni doontaan, imana heli doontaan, meeshaan joogona iman kari maysaan. ³⁵Sidaa aawadeed Yuhuuddu waxay isku yidhaahdeen, Kanu xaggee buu tegi doonaa oo aynaan ka heli doonin? Ma WUXUU U tegi doonaa kuwa ku kala firidhsan dadka Gariigta ah, oo wax bari doonaa dadka Gariigta ah? ³⁶Waa maxay hadalkan UU yidhi? Waad i doondooni doontaan, imana heli doontaan, meeshaan joogona ma iman kari doontaan.

7:32 “wadaaddadii sare iyo Farrisiintii” tani waxay ka hadlaysaa xubnahii Sanhedrinta (ka eeg mawduuc gaar ah 3:1) waxaa jiri jiray hal wadaad oo sare, balse tan iyo xiligii qabsahsadii Roomaaniyiinta, jagadan waa la

siyaasadeeyay oo waxaa ku gorgortami jiray dhawr qoys oo Yuhuud Maalqabeeno ah, kuwaasi oo xubin qoyseed kasta us ii gudbin jirtay xubin qoyseed kale.

☐ **“waxay u direen saraakiil inay soo qabtaan isaga”** tani waxay ka hadlaysaa “ilaaladii macbudka” oo ahaa Laawiyyiin. Macbudka banaankiisa waxay sidoo kale ku lahayeen awood xadidan.(7:45, 46;18 2:3, 12, 18, 22)

7:33 “Weli in yar baan idinla joogayaa” tani waa odhaah can ku ah Yooxaana (cf.12:35;13:33;14:19;16:16-19). Ciise waa ogaa ka uu ahaa, waxa ku dhici doona, iyo goorta ay ahaan doonto (cf. 12:23; 13:1;17:1-5).

☐ **“markaasaan u tegayaa kii i soo diray”** tani waxay sheegaysaa dhacdada gabo gabada ee hawlgalkii Ciise danbidhaafka: isku talaab ku qodbida, sarakicida, u dheelminta sammada, iyo soo noolaynta ammaantii hore u jirtay (cf. 17:15; Faliimaha Rasuullada 1).

7:34 hadaladani waxay la mid yihiin falaanqayntii Ciise xerta kula lahaa qolka sare (13:33, cf.7:36 iyo 8:21). Hase ahaatee, halkan waxay ka hadlaysaa kuwa aan rumaysadka lahayn (i.e. dakii badnaa, dadkii reer Yerusaleem, hoggaamiyeyaashii diinta ee Yahuuda).

7:35-36 “Ma WUXUU U tegi doonaa kuwa ku kala firidhsan dadka Gariigta ah, oo wax bari doonaa dadka Gariigta ah?” naxwe ahaan jumladan dhismeedka qaabkan ah waxaa laga filan karaa “maya”jawaab. Tani waa hab adeegsi kale oo xoogan. Tani badiyaaba waxay ahayd doonsita Ilaah (Bilowgii 3:15; 12:3; Ishacyah 2:2-4). Marka lagu jiro, xiliga Iida waababka todobaatan dibi ayaa la loogu deeqi jiray quruumaha dunida. Yuuhuuda waxaa lagu waajib yeelay in ay u tukadaan, iftiinkana u geeyaan dadyowga aan Yahuuda ahayn.waxaa laga yaabaa in tani ay ka hadlayso hadal kan dhaqan ahaan sidan u soo dhigan. Ereyga afka Giriiga ah ee oo adeegsaday macne muujinta “dadka aan Yahuuda ahayn” ereyga *disperia* waxay tilmaamaysaa dadkii Yahuuda ahaa eek u filiqsanaa dhulka Giriigta (Yacquub 1:1, I Butrus 1:1). Tanina waa tusaale kale oo tilmaamaya sida ay dakii badnaa ay si qaldan ugu fahmeen Ciise, luuqadiisii sarbeebnayd.

Tani waa tusaale kale oo xariiq toosan oo labo ahaanshaha Ciise. Dadkii badnaa fahan qaldan ayay ka qaateen Isaga waayo waxay hadaldiisi turjunteen si ku siman sida hadalada caadigi ah, halkii ay ugu fahmi lahayeen qaar ka yimi “sare” iyo “hoos” heerarka waxbaristiisa. Waxa uu ka yimi Aabbaha wuxuuna u laabanayay Aabbaha.

NASB (UPDATED) TEXT: 7:37-39

³⁷Maalintii u dambaysay, oo ahayd maalintii weynayd ee iidda, Ciise ayaa istaagay oo qayliyey isagoo leh, Haddii qof uun harraado, ha ii yimaado, hana cabbo. ³⁸Kii i rumaysta, calooshiisa waxaa ka duuli doona webiyo biyaha nool ah, sida Qorniinku u yidhi. ³⁹Waxaas ayuu kaga hadlay Ruuxa oo ay kuwii isaga rumaystay heli doonaan, waayo, Ruuxa weli lama bixin, maxaa yeelay, Ciise weli ma ammaanmin.

7:37 “Maalintii u dambaysay, oo ahayd maalintii weynayd ee iidda” suaalo ayaa laga qabaa in ay tani ahayd Iid todoba maalmood (cf. Sharciga kunoqoshadiisii 16:13), ama Iid sided casho ah (cf. Laawiyyintii 23:36, Nahmeya 8:17; II Macabees 10:60, iyo Josephus). Sida muuqata, maalmahii Ciise waxay ahayd Iid sided casho ah, hase ahaatee, maalinta ugu danabysa biyo lagama soo qaadanayn wartii Shiiloom oo laguma shubayn gunta meesha wadaadku fadhiisto siday ahaan jirtay todabad casho ee kale. Waxaan garanaynaa xafladii Tractiin Sukkah ee Talmuudinta, taasi ay soo xigato Ishacyah 13:3 tani waxaa laga yaabaa in ay ahayd salad roob doon ahaan loo tukado in roob abuurka saara yimaado.

☐ **“Haddii”** tani hadal shuruudeed heerka seddexaad ah, manaheeduna yahay fal suurogalnimadiisu sareyso.

☐ **“Haddii qof uun harraado”** casuumada caalamiga ahee rumaysadka Ciise! Ka eeg qaraal 7:17

☐ **“ha ii yimaado, hana cabbo.”** Ciise waxa uu ku adeegsaday sarbeeb la mid ah 4:13-15. Tani waxaa dhici karta in ay sheegayso Masiixa Dhagaxiisa biyahu ka yimaadaan (cf. I Korintiyos 10:4). Sida muuqata, waxay xidhiidh la leeday casuumadii Axdiga Hore ee Ishacyah 55:1-3 iyo calaamad u taagan caaddadii dhaqan ahaaneed ee biyo daadinta xiligiga Iida.

Qaar ka mida qraalada qadiimiga ah ee Giriiga waxay ka tagaan “aniga” (cf. MSS P66, N iyo D) waay ku jirtaa P66, p75, N, L, T, W, waxayna ku sarbeeban tahay macnaha guud. UBS ayaa waxa soo qaataa ku jiritaanka ay ku jirto “B” qiimaheeda (aadna ugu dhaw hubaalti) Yooxaana dhexdiisa dadku waxay ku murmeen in ay aaminaan. Injiilku waxa uu leeyay muhiimadsarid shakhsi ah.

7:38 “Kii i rumaysta, ” ogaysiis kani waa fal jooge oo xaadir ah. Tani waxay ina tusaysaa xoogana saaraysaa socoshada xidhiidhka shakhsiga ah eek u lug leh rumaysadka sida Yooxaana 15 “hoggansamid” ka eeg mawduuc khaas ah: falka weedha Giriiga ah ee loo adeegsaday Badbaado 9:7

▣ **“sida Qorniinku u yidhi.”** Way adag tahay in la garto qoraal khaas ah oo ay tani soo xiganayso. Waxay noqon kartaa Ishacyah 12:3; 43:19-20; 44:3; 58:11; Yexisqel 41:1 Yooceel 3:18; Sakariya 13:1, ama 14:8, taasi macnaheeda dahsoon yahay calaamad biyahii iid dhaqmeedka oo hadda u taagan mid rabbani ah. Xaaladan haddaba marka la eego biyaha loo ballan qaaday fac cusub si ay u si barakaysan ugu waraabiyaan ayaa waxaa isbadal ku keenay sarbeebta dabeecada waligeed ah ee Axdiga Cusub. Ruuxu waxa uu si fir fircoon ugu jiri doonaa qalbiyada iyo niyad (cf. Yexisqel. 36:27-28).

▣ **“calooshiisa waxaa ka duuli doona webiyo biyaha nool ah, ”** waxaa jiara dhawr sheekooyin oo magac u yaalkan horgalaha ah.

1. Ciise laftiisa (cf. Aabbayaashii Kiniinsadihii hore)
2. Shakhsiga rumaysata ah ee Ciise rumaysatay ee aamminay
3. Yerusaalem. Afka Armaaniga “” kiisii” waxay macne ahaan noqon kartaa “teedii” waxayna ahaan kartaa markaa magaalada (meeshan waddaadadii diinta , cf. Yexisqeel 47:1-12 iyo Sakariya 14.8)

Waxaa jirta soo koobis wanaagsan, oo lana fududeeyay falaanqaynta labadan sheeko oo ku salaysan sida hakadyada aayada 27p iyo 38a ee NIDOTTE, vol 1, p.683.

Ciise laftiisa ayaa isgu yeedhay biyaha nool (fc.4:10) imika macnaheeda guud waa Ruuxa Quduuska ah (cf. Aayada 39) ka bixiya ee siiya biyaha nool Ciise raacayaashiisa. Tani waxay barbardhid u tahay ruuxa oo rumaysta yaasha Ciise kala mid dhigaya (cf. Rooma 8:29; Galaatiya 4:4:19, Efasos 4:13).

7:39 “Ruuxa weli lama bixin, maxaa yeelay, Ciise weli ma ammaanmin.” Sida muuqata tani waxay ka turjumaysaa fikrada warqada Yooxaana (i.e faallo tafatire) muhiimada hadalkani leeyay waa carrabada iyo maalintii Beentakostalka taasi oo labadaba loo arkay in “la ammaan” (cf. Yooxaana 3:14;12:16, 23; 17, 1, 5). Waxaa jira dhawr qoraal kala duwan oo isku dayay in ay macneenayaan waxaa Yooxaana uga jeeday hadalkan kooban.

NASB (UPDATED) TEXT: 7:40-44

⁴⁰Sidaa aawadeed dadkii badnaa qaarkood, goortay hadalladaas maqleen, waxay yidhaahdeen, Runtii kanu waa nebigii. ⁴¹Qaar kalena waxay yidhaahdeen, Kanu waa Masiixii. Qaarse waxay yidhaahdeen, Laakiin Masiixii ma WUXUU ka imanayaa Galili? ⁴²Qorniinku miyaanu odhan, Masiixu WUXUU ka iman doonaa farcanka Daa'uud iyo tuuladii Beytlaxam oo Daa'uud joogay? ⁴³Sidaa daraaddeed dadkii badnaa waa kala qaybsamay aawadiis. ⁴⁴Qaarkood baa doonay inay qabtaan, laakiinse ninna faro ma uu saarin.

7: 40 “Runtii kanu waa nebigii.” Tani waa tilmaan horay loo sii sheegay oo ku saabsan ballankii Masiixa ee xilligii Muuse sida ku qoran Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15, 1. Kuwo badan ayaa Ciise u aqbalay in uu sidii nebi (cf. 4:19; 6:14; 9:17; Matayos 21:11). Awooddii Ciise way aqoonsadeen laakiin qofka uu yahay iyo shaqadiisa ayey six un u fahmeen. Islaamku xataa sidoo kale way ugu yeedhaan magacxan, laakiin waxa ay six un u fahansan yihiin farriintiisa.

7:41 “Qaar kalena waxay yidhaahdeen, Kanu waa Masiixii” tani waxa ay muujinaysaa in ereyga “”Masiixa”” uu la mid yahay ereyga Cibraniga ah ee macnihiisu yahay “Midka la subkay”. Sida Axdigii Hore ku jirta boqorrada, wadaaddada iyo nebiyada waxaa loo subki jiray in ay calaamad Ilaah ugu yeedhay iyo qalabayn. Ka eeg Mawduuc Gaar ah: subkidda, ama doorashada ku jirta Baybalka 11:>2.

▣ **“Qaarse waxay yidhaahdeen, Laakiin Masiixii ma WUXUU ka imanayaa Galili”** Isku xidhka naxwaha Giriiggu waxa uu doonaa “maya” oo jawaab u ah su’aashan. Laakiin ka warran Ishacyaah 9:1?

7:42 Isku xidhka naxwe waxa uu aayaddan ka rajeeyaa “haa” jawaab ahaan.

▣ **“farcanka Daa’uud”** (II Samuu’eel 7; Matayos 21:9; 22:42).

▣ **“Beytlaxam oo Daa’uud joogay”** Kani waa adeegsi kale oo aad u adag (cf. Miikaah 5:2-3 iyo Matayos 2:2-6).

7:43 Ciise iyo farriintiisu waxa yhad iyo jeer abuurayeen kala qaybin (cf. 7:48-52; 9:16; 10:19; Matayos 10:34-39; Luukos 12:51-53). Tani waa layaabka labaad eek u jira masaalkii carrada (cf. Matayos 13). Qaar waxa ay leeyihiin dhego ruuxi ah qaarna ma lahan (cf. Matayos 10:27; 11:15; 13:9.15 (labo jeer), 16, 43; Markos 4:9, 23; 7:16; 8:18; Luukos 8:8; 14:35).

NASB (UPDATED) TEXT: 7:45-52

⁴⁵Saraakiishii haddaba waxay u yimaadeen wadaaddadii sare iyo Farrisiintii, iyaguna waxay ku yidhaahdeen, Maxaad u keeni weydeen? ⁴⁶Saraakiishii waxay ugu jawaabeen, Ninna weligiis uma hadlin sida ninkaasi u hadlay. ⁴⁷Farrisiintii haddaba waxay iyaga ugu jawaabeen, Idinkana ma laydin khiyaaneeyey? ⁴⁸Miyaa taliyayaasha midkood ama Farrisiinta rumaystay isaga. ⁴⁹laakiin dadkan badan oo aan sharciga garanaynin waa inkaaran yihiin. ⁵⁰Nikodemos (kii markii hore Ciise u yimid, isagoo ah midkood) WUXUU iyaga ku yidhi, ⁵¹Miyaa sharcigeennu xukumaa nin, iyadoo aan marka hore laga maqlin isaga oo aan la garanaynin wuxuu sameeyo? ⁵²Kolkaasay u jawaabeen oo waxay ku yidhaahdeen, Adiguna ma reer Galili baad tahay? Doondoona, oo arag inaan nebi ka kacayn Galili.

7:46 **“Saraakiishii waxay ugu jawaabeen, Ninna weligiis uma hadlin sida ninkaasi u hadlay”** Yooxanaa adkaantiisii mar kale! Waa mar qaati fur bilow ah.

1. Kama aysan sheegin cabsidoodii ay ka qabeen dadkii badnaa oraalli garayn fiican u noqon lahaa iyaga.
2. Booliska macbudka waxa ay u ahayd wax iska caadi ah fikirkooda ku saabsan Ciise, halkaasoo ay dadkii badnaa ku kala qaybsameen.
3. Nimankani waxa ay caadaysteen in ay raacaan sharciga, ee ma aha in ay dhiibtaan ra’yigooda.

7:48 **“Miyaa taliyayaasha midkood ama Farrisiinta rumaystay isaga”** Isku xidhka naxwaha Giriiggu waxa uu aayadda. 47 iyo tan 48 ka sugayaa jawaabta ah “maya”. Ereyga “saraakiishii ” waxa ay =u taagan tahay senherdin. Halkan waxaan ku haysannaa Sudukiin iyo Faarrisiin. (Senherdinka daran), kuwaasoo had iyo goorba cadaw isku ahaa midkoodba midka kale, ayaaba ku midoobay ku kla qaybsanaantoodii Ciise (cf. 11:47, 57; 18:3).

7:49 **“laakiin dadkan badan oo aan sharciga garanaynin waa inkaaran yihiin”** Tni waxa ay la xidhiidhaa “dadkii dhulka” (*am ha ares*) kuwaasoo hoos u eega hoggaamiyayaasha diinta maxaa yeelay maysan wada fulin dhaqannadii afka ahaa (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 27:26). Yooxanaa adkaantiisii waa ay asii socotaa oo waxaa laga rkayaa aayadda 51, halkaasoo Nekadoomas uu iyaga ku tilmaamayo in ay sidoo kale jebinayaan sharcigamarka eego sida ay ula macaamilayaan Ciise. Alla, bal eeg mucjisada haysata kuwa diimaha. Kuwa daciifka ah ee habaaraya (*eparatos* oo laga helo oo qudha Axdiga Cusub) dadka caadiga ah ayagaa qudhoodu is inkaaraya. Haddii uu iftiinku mugdi noqdo, waa sidee sida uu mugdigu u darraanayo! Digtoonaada, dadka casrigaahow, kuwiinna muxaafidiinta ahow, kuwa diimaha bartayow!

7:51 **“Miyaa sharcigeennu xukumaa nin, iyadoo aan marka hore laga maqlin isaga oo aan la garanaynin wuxuu sameeyo”** Isku xidhka naxwaha Giriiggu waxa sugayaa jawaabta ah “maya”. (cf. Baxniintii 23:1; Sharciga Ku Noqoshadiisa 1:16).

7:52 **“Adiguna ma reer Galili baad tahay”** taniwaxa au muujinaysaa sida ay Sanhedriniyiintu uga soo horjeedaan Ciise.

▣ “Doondoan, oo arag” raadintu waxa ay lahayd tilmaan marka la eego Yuhuudda barashadoodii Qorniinnada (5:39). Tani waxa ay mar kale muujinaysaa Yooxanaa oo arrin adah isticmaalaya. Bal ka warran Eliishaa (I Boqorrada 17:1) iyo Yoomis (II Boqorrada 14:25), Hosheeca iyo Naaxuum? Waa in ay ula jeedeen “gii” Nebigii sida ku jirta Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15, 19; Bilowgii 49:10; II samuu’eel 7.

7:53-8:11 Ka eeg ogaysiiska ku yaal bilowga cutubka 8.

SU’AALO FALAQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeen kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Maxay tahay taswiirta uu iiddan ka bixinayo hadalkii Ciise sida ku qoran cutubka 7-aad?
2. Qeex sharraxaadna ka bixi ujeedka “iidda waababka”
3. Maxay hoggaamiyeyaashii diintu sidaa ugula colloobeen Ciise?
4. Tax, kooxaha kala duwan ee ka faallooday Ciise cutubkan dhexdiisa?

YOOXANAA 8

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Haweenaydii Sinada lagu eedeeyey 7:5-3-8:11	Sinaystayaasha oo waajahaya iftiinka dunida 7:53-8:12	Haweenaydii lagu qabtay sinada 7:53-8:11	Haweenaydii lagu qabtay sinada 7:53-8:11	Haweenaydii Sinaystay 7:53-8:11
Ciise waa iftiinka dunida 8:12-20	Ciise oo difaacay markhaatifurkiisa 8:13:20	Ciise waa iftiinka dunida 8:12-20	Ciise waa iftiinka dunida 8:12 8:13 8:14-18 8:19a 8:19b 8:20	Ciise waa iftiinka dunida 8:12 Dood ku saabsan isu markhaatifurista Ciise 8:13-18 8:19a 8:19b 8:20
Meesha aan tegayo ma iman kartaan 8:21:30	Ciise wuxuu sii sheegay tegitaankiisa 8:21-29 Runtu xorbay idinka dhigaysaa 8:30-36	8:21-30	Ma tegi kartaan halka aan tegayo 8:21 8:22 8:23-34 8. 25a 8:25b-26 8:27.29 8:30	5:19-47 8:21 8:22-4 8. 25a 8:25b-26 8:27.29 8:30
Runtu waxay idinka dhigi doontaa xor 8:31-38		8:31-33	Runtaa idin xorayn doonta 8:31:32 8:33	Ciise iyo Ibraahim 8:31:32 8:33-38
Aabbihiin Iblis 8:39-47	Farcanka Ibraahim iyo Shaydan 8:37-47	8:34-38 8:39-47	8:34-38 8:39 8:39b-4a1	8:39-41a

Ibraahim hortiiis anaa ahaa			8:41b	8:41b-47
			8:42-47	
	Ibraahim hortiiis anaa ahaa			Ciise iyo Ibraahim
8:48-59	8:48-59	8:48-59	8:48	8:48-51
			8:49-51	
			8:52-53	8:52-56
			8:54-56	
			8:57	8:57-58
			8:58	
			8:59	8:59

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

İYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 7:53-811

A. Yooxanaa- 7:53-8:11 ka ma ay qayb ahayn asal ahaan Injiilka Yooxanaa.

B. Daliilka qoraalkani (hal jumlad oo Giriig ah) inaanu ka mid ahayn Injiilku waa

1. Cadaymaha dibadda ah

a. ka maqnaanshaha qoraal gacmeedyada Giriigga

1) Papyrus – P⁶⁵ (horraantii qarnigii saddexaad), P⁷⁵ (qarnigii saddexaad)

2) Uncials – a (Qarnigii afraad), B (Qarnigii afraad) waxay ka maqantahay A iyo C. Halkan waa ay ku dhaawacanyihiin Yooxanaa marka la eego, laakiin marka la eego inta badbaaday qoraal gacmeedyadu meel kuma laha.

b. Kuwo badan oo ka mida qoraal gacmeedyada danbe ee Giriigu si gaara ayay u calaamadaynaayan iyadoo la toosinayo inaanay asal ahayn.

c. Waxa laga helayaa meelo kala duwan oo ka mida qoraal gacmeedyadii danbe

- 1) Ka dib Yooxanaa 7:36
 - 2) Ka dib Yooxanaa 7:44
 - 3) Ka dib Yooxanaa 7:25
 - 4) Sida Luukos ka dib 21:38
 - 5) Sida Luukos ka dib 24:53
- d. ka maqnaanshaha tarjumaadihii hore
- 1) Latiinkii hore
 - 2) Syriac ga hore
 - 3) Kuwii hore ka mid ahaa nuquladii Peshitta (ka dib Syriac)
- e. Qoraalkan wax faallo ah kama bixinayaan wadaadadii hore ii Giriiggu (ilaa qarniga labaatanaad)
- f. Hadii ay ahayd xiligaas la joogay calaamadu D (Bezea), ee qoraaladii ay bani-aadanku qoreen reer Galbeedka ahi qarnigii lixaad, sida Latin vulgate.iyo weliga warqadii kale ee ka dembaysay Pershitta.
2. Cadaymaha gudaha
- a. Eray bixinta iyo qaabku waxa ay in badan isaga aad ugu eeg yihiin Luukos ugana dhow yihiin Yooxanaa. Waxaana markoodii hore laga soo qaaday qoraalo Giriiga marka aan eegno Luukos 21:38 iyo kuwii kale ee ka dambeeyey 24:53.
 - b. Tani waxa ay guud ahaanba jebisay hadaladii Masiixa markii uu Masiixu la hadlaayey kuwii hogaamiyayaasha ahaa ka dib dabaal degii Waababka, 7:1-52, 8:12-59.
 - c. Lama mid aha Injiillada kale
3. Falayaqyn dheeraad ah ka eeg Bruce M Metzgers kitaabkiisa *A Textual Commentary on the Greek New Testament*, pp. 219-221.
- C. Tani waxa ay u tahay mid xagga dhaqanka sida marka ay dadku hadlayaan wixii ku saabsanaa Masiixa noloshiisa. Haddaba si kastaba ha ahaatee. Waxa aan halkan ka helaynaa wax badan oo ku saabsan Ciise. Noloshu ay ka hadlayeen kuwa ku qoray waxa ay doorteen inayaan wax cadayna laayn (Yooxanaa 20:30-31). Waxa ay ahaayeen kuwa loo muujiyey Injiilka qoritaankiisa. Markaas ka dib wax qoraala ah lagama qorin kuwaas oo ay la mid yihiin wax ka hadlaaya noloshii Masiixa. Iyo xitaa awoodihiisii, kuwaasi ma ay ahayn qaar ay ka mid yihiin inaan loo muujin asal ahaan qorayaashii. Asal ahaan wixii ay qoreen qorayaasha oo keli ahi kuwaas ayaa waxa ay ka mid yihiin kuwo uu hogaaminayaayey Ruuxa Quduuska ah kuwo uu doortay, iskuna dubariday, isla markaasna la qabsaday shaqadii iyo erayadii Masiixa. Fariimahaasi ma ay ahayn kuwo asal ah, sidaas daraadeed, kuwani ma aha qaar la waxyooday marka xitaa lagu daro inaga Kitaabkeena.
- D. Inagu u ma aan dooran fariinta qoraalkani ka hadlaaya sababta oo ah anigu ma ahi mid rumaysan.inay kuwani yahay qalin kii John. Sidaas daraadeed, ma aha mid ka mid ah qaybta la neefsaday qoraaladani. (xitaa hadii ay tahay taariikh ahaan).

NASB (UPDATED) TEXT: 8:12-20

¹²Haddaba Ciise ayaa mar kale la hadlay iyaga, oo wuxuu ku yidhi, Anigu waxaan ahay nuurka dunida. Kii i soo raacaa, gudcurka kuma socon doono, wuxuuse lahaan doonaa nuurka noloshu. ¹³Sidaa aawadeed Farrisiintu waxay ku yidhaahdeen, Marag baad isu furaysaa, maraggaagguna run ma aha. ¹⁴Ciise baa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, In kastoo aan marag isu furo, maraggaygu waa run, waayo, waxaan garanayaa meeshaan ka imid iyo meeshaan tegayo, idinkuse garan maysaan meeshaan ka imid ama meeshaan tegayo. ¹⁵Idinku waxaad wax ka xukuntaan xagga jidhka, aniguse ninna ma xukumo. ¹⁶Haddaan xukumo, xukunkaygu waa run, waayo, anigu keligay ma ihi, laakiin waa aniga iyo Aabbahaygii i soo diray. ¹⁷Sharcigiinna waxaa ku qoran, Laba nin maragoodu waa run. ¹⁸Anigu waxaan ahay kii isu marag fura, oo Aabbahaygii i soo dirayna ayaa ii marag fura. ¹⁹Sidaas aawadeed waxay ku yidhaahdeen, Aabbahaa xaggee buu joogaa? Ciise ayaa ugu jawaabay, garan maysaan, Aabbahayna garan maysaan. Haddaad i garanaysaan, Aabbahayna waad garan lahaydeen. ²⁰Haddalladaas ayuu kaga hadlay meeshii khasnaddu tiil intuu macbudka wax ku barayay. Oo ninna ma uu qaban isaga, waayo. saacaddiisii weli ma iman.

8:12 “Haddaba Ciise ayaa mar kale la hadlay iyaga”, “kuwii faraha badnaa” tani ma aha mid lagu xusay cutubkan. Waxaa laga yaabaa inay ahayd dabaal degii Tabernacles markaasi waxa ay ahayd markii uu Ciise

joogay meel macbuka u dhow. Halkaas oo uu isku dayeeyey inuu markhaati fur u sameeyo kuwa Yuhuuda hogaamiyayaashooda ah.

Haddabasi, kastaba ha ahaatee, sidii uu Ciise u isticmaalay markii uu meesha biyaha xaflada joogay, hadaba qaybtan waxa uu isticmaalay sidii uu u iftiimin lahaa hadaladiisa ee uu isagu muujin lahaa xiliga dabaal dega. Sida runtii ah taasi waxa ay ahayd mid suuro gal ah. 8:12-10-21 ilaa iyo hadda waxa uu joogay dabaal deggii Waababka.

▣ **“Anigu waxaan ahay nuurka”** Cutubka 6, 7 iyo 8 tani waxa ay u muuqataa inay la xidhiidho “mucjisooyinkii lama degaanka” mudadii reer Bani-Israa, iil taariikhdooda. Kuwanina waa tusaalayaasha Ciise naftiisa u adeegsaday

1. Cutubka 6 waxa lagu isticmaalay “manna” iyo “kibista nolosha”
2. Cutubka 7 na waxa lagu isticmaalay “biyaha” iyo “Biyaha nool”
3. Cutubka 8 na wax lagu isticmaalay “Iftiinka” iyo “ammaanta *Shekeniah*”

Tusaalayaashani waa ay kusoo dhex noqnoqonayaan Yooxanaa (cf. 1-4-5, 8-9, 3:19:21 9:5 12:46).

Waxa jiray doodo ka taagan waxa asal ahaan loogala jeeday kuwan

1. Cabsidii hore ee mugdiga laga qabay
2. Magaca Ilaah ee Axdiga Hore dhexdiisa (Sabuurka 27:1; Ishacyaah 63:20; 1 Yooxanaa 1:5)
3. Asalka dabaal degyada ee Waababka iyo iftiiminta meesha dumarku joogaan
4. Iyadoo la tilmamayo Shekinah daruurihii nimcada Ilaahay ka mid ahaa markii ay lama degaanka marayeen Taas oo tusinaysay joogitaankiisa.
5. Magacyadii Masiixa ee Axdiga Hore dhexdiisa (cf. Ishacyaah 42:6, 49:6, Luukos 2:32).

Xitaa rabbiska waxa lagu isticmaalay “Iftiin” sida uu magaciisu yahayna waa Messianic. Iftiiminta nalalkii faraha badnaa xiligii Haweenayda la saaraayey Maxa kabada.

Xiligii dabaal dega Tambenacle taasina waxa ay ahayd waxyaabihii hadaladiisa uu Ciise ugu sheegay. Massianic soo jeedintoodii waxa ay ahayd iftiin iyo weliba soo jekhaaska ahayd 1:4:8 taasina waxa ay ka mid ahayd wacdigiisii uu Ciise ugu muujiyey runta xaqiiqada ah.

Tani waxa ay kamid tahay toddabada hadal ee ah “Aniga” kuna dhex sugan Yooxanaa

1. Anigu waxa aan ahay kibista nolosha (6:35, 41, 46, 51).
2. Anigu waxa aan ahay Iftiinka dunida (8:12.9:5, cf 1:4, 9 12:46)
3. Anigu waxa aan ahay kadinka idihi ka galaan (10:7, 9).
4. Anigu waxa aan ahay adhi jirka wanaagsan (10:11, 14)
5. Anigu waxa aan ahay saro kicida, iyo Nolosha (11:25)
6. Anigu waxa aan ahay jidka, runta, iyo nolosha (14:6)
7. Anigu waxa aan ahay geedka canabka ah ee runta ah (15:1:5)

Kuwani waxa ay yihiin odhaayo gaar ah oo laga heli karo Yooxanaa oo keliya. Kaasina waxa uu inoo sheegayaa waxa uu yahay Ciise, isaga oo eegaaya waxyaabaha ay shiqsiyaadku ka fekarayaan ee ah badbaada. Waxaa inagu waajiba inaan isaga rumayno!

▣ **“Dunida”** eraygan (Kosmos, eeg Mawduuca Gaarka ah 14:17) waxa uu tusinayaa sida Injiilku Ciise Masiix caalamiga u yahay (cf. 3:16).

▣ **“Kii inaga is soo raaca”** tani waxa ay tahay waxa hada jooga oo socda. Waxyaabaha ugu badan ee aan ku xusuusan karo Masiixiyada inaanay ahayn mid xaasida ama marka aan ka hadlayno Erayga Ilaah, halkii, tani waxa weeye xidhiidh qof ku la leeyahay kuwaas oo raacaya qaabka nolosha xernimada ah (cf. Matayos 28:18-20; 1 Yooxanaa 1:7).

▣ **“gudcurka kuma socon doono”** Tani waxa ay tahay tusaale ay sameeyeen qaar bartay wax barashada qaldan ee shaydaanka “isaga oo in dhahoodii ka xidhay inay wax arkaan” (cf. 2 Korintos 4:4). Waxa kale oo jira tusaale kale oo aan ka helayno OT fariintaasi waxa ay ka hadlaysaa erayga Ilaah. Taas oo ka hadlaysa erayga Ilaahay “Eraygaygu waxa uu cagahaaga u yahay lamabad” (cf. Ps. 119:105).

Haddaba kuwan aq balay “iftiinku” “waa inay ku noolaataan nolol gaar ah” (1 Yooxanaa 1:7)!

▣ **“nuurka nolosha”** Ciise waxa uu siiyey noloshiisa kuwa raacay Ilaah (cf Matt 5:14), kuwaas oo uu Ilaahay siiyey iyaga.

8:13 “Farrisiinta” waxa aad eegtaa Mawduuca Gaarka ah. 1:24.

▣ **“maraggaagguna run ma aha”** Kuwa yuhuuda ahi waxa ay ku eedaynayaan wax xagga sharciga ah iyo cadaymihiisa (i.e. , , , waxaa laga codsanayaa ilaa iyo laba markhaati, cf. Tirintii 35:30, Baxniintii. 17:6, 19:15 - 21). Ciise waxa uu mar hore ka hadlay inuu tan aad u diiday (cf. Yooxanaa 5:31ff) wuxuuna siiyey markhaatiyaal kala duwan qoraaladaasna Aabihii ayaa uga markhaati kacay!

8:14, 16 “haddii, , , , haddii” labaduba waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah Taas oo macne khaas ah loola jooda ficil ahaan. Inta badan xaaladahaasi waxa aad ka helayasaa cutubka 8 kuwaasina noocan ayay yihiin.

▣ **“waxaan garanayaa meeshaan ka imid iyo meeshaan tegayo,”** Taasina mar labaad waxa ay tahay “bilowga iyo korka” duasalim. Ciise wax shaki ah kama qabin xusuustiisa isaga jiritaankiisa Aabaha. Isla markaasna waxa uu fahamaayey. Isaga doonistiisu waxa ay tahay wuxuuna lahaa dareenka wax sii sheegida. (cf Yooxanaa 1:1-4, 14:18, 7:28-29, 13:1 17:5).

▣ **“idinkuse garan maysaan meeshaan ka imid ama meeshaan tegayo”** tan waxaa waajiba inay la xidhiidho cutubka 7. Ma ay garanayn meeshii uu Ciise ku dhashay (cf. aayadaha 41:42) laakiin xitaa iyagu ma ay ogayn halka uu isagu aadaayo (cf. 7:34-36, 8:21) waxa aad eegtaa mawduuca khaaska ah. taasi oo Ciise loogu markhaati furaayo 1:8.

8:15 “Idinku waxaad wax ka xukuntaan xagga jidhka” waxyaabihii lugu xusay cutubka 7 (cf. aayada 24). Waxa aad eegtaa Mawduuca Gaarka ah: Jidh (*sarx*) 1:14.

▣ **“aniguse ninna ma xukumo”** waxa aan halkan ka arkaynaa iska hor imaad kaas oo u dhexeeya Yooxanaa 3:17 iyo 9 :39, Ciise uma iman inuu wax xukumo. Laakiin waxa uu u yimi inuu nolol ina siiyo. Wax walbana isaga ayay run ku yihiin imaanshihiisa. Kuwa isaga diidan wuuna xukumi doonaa. (cf 3:18-21)

8:16-18 Tani waxa ay ahayd arrin loo baahanaa laba markhaatiya oo looga baahan yahay marka maxakabada la saaraayo (cf. Tirintii 35:30 Baxniintii 17:6, 19:15) Ciise ka ma uu hadlin wax intan ka badan xaaladahan kala duwan, kuwaas oo cadaynaaya isagu waxa inuu markhaati u yahay Aabuhu (cf 7:29 14:9). Waxa aad eegtaa Mawduuca Cutubka. Kaas oo loogu markhaati kacaayo Ciise 1:8.

8:16

NASB (1970), NJB, REB “Kii aniga I soo diray”

NASB (1995), NJKF, NRSV, NIV “Aabaha aniga isoo diray”

Halkan waxaa ka jira waxyaabo is fahan la, aan ah kuwaas oo u dhexeeya laba qoraalo ah NASB waxa ay yihiin labadaasi UBS.

1. USS³ waxa “Aabuhu ” ku dhigayaa “C” isagoo ku tirinaya (MS P^{39.66.75}, \aleph^2 , B, L, T, W)
2. UBS⁴ waxa “Aabaha” ku siinayaa “A” tirintiisa (MSS ^a, D iyo qaar ka mid ah waraaqihii hore ee Syriac version laga soo qaaday).

Ciise weligiis ma noqon mid keliya! Aabuhuna waxa uu la jiray isaga (cf aayadaha 16:29, 16:32) waxa ay qirteen fariinta isku talaabta (cf Markos 15:34) waxaana ka buuxay Jacayl iyo xidhiidh ay lahaayeen kaas oo ahaa xagga badbaada. Ujeedada uu Ilaahay noo abuuray inuu mid waliba isaga u ugu yimaado si uu xidhiidh ula yeesho. Isaga (i.e. Masiixa, cf, Yooxanaa 1:3 1Korintos 8:6 Kolosay 1:6, Cibraaniyada 1:2) waxa uu abuuray YHWH, s u ekaanshiisa iyo abuuristiisa (cf. Bilowgii 1:26, 27). Tani waxa ay ahayd mid uu dembi ka buuxo. Taasina waxa ay ahayd ujeedada rajo soo celinta hawl galka Ciise!

8:19 “Aabbahaa xaggee buu joogaa?” waxa ay ilaa iyo hadda fahan sanaayeen Ciise shaqsi nimadiisa, habka qoraal ahaan. Sida loo sameeyey iyo maskixii sida taxadarka leh ugu dhowaa runta (cf. aayada 27). Tani waxa ay ka timi is fahan la, aanta qaabka dabecad ahaan loo qoray qoraalada gaar ahaan Injiilka Kitaabka Yooxanaa.

▣ **“Haddaad i garanaysaan, Aabbahayna waad garan lahaydeen”** waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah. Tan inta badan waxaa loogu yeedhaa “xaqiiqada runta ah” “Haddii aad I ogaan lahaydeen kuma

ayaad garanaysaan . markaas ka dib ayaad garanaysaan Aabaha, kaas oo ay naan garanayn ” halkaas waxa lagu soo celiyey in badan 5:37, waxa aad qoraal in tan ka badan ka eegtaa 7:28. Waa ay adag tahay in la kor maro Injiilka sida Yooxanaa sababtuna waxa ay tahay waxa ay u eeg yihiin. Wax si fiican loo habeeyey. Oo ay hubiyeen kuwii ka wada shaqaynaayey amaba calaamado ay ku celiyeen qorayaashii.

8:20 “Haddalladaas ayuu kaga hadlay meeshii khasnaddu tiil” aayadani waxa ay noo sheegaysaa inay ka timi daabacado kale kuwaas oo markhaati gacanta lagu hayo ahaa. Hanbtidu waxa ay ahayd mid ka mid ah dhismaha. Waxayna ahayd dhaqanka Rabbayga (*Shekalim* 6). Waxa ay leedahay waxaa jiray qolo faro badan kuwaas oo u samaysnaa qaab sanduuq weyn oo wax lagu guro. Mid walba ujeedo khaas ah ayuu lahaa, wuxuuna ku yaalay Haweenka Maxakamada (cf Markos 12:41) halkaas oo ay yaaleen nalal aad u xoog badan kuwaas oo loogu talo galay inay ifiyaan xiliga la leeyahay xaflada Waababka.

▣ “saacaddiisii weli ma iman.” Eeg fiirada 2:4.

NASB (UPDATED) TEXT: 8:21-30

²¹Sidaas aawadeed wuxuu haddana ku yidhi iyaga, Waan tegayaa, waadna i doondooni doontaan, waadna ku dhiman doontaan dembigiinna. Meeshaan tegayo iman kari maysaan. ²²Sidaas daraaddeed Yuhuuddu waxay yidhaahdeen, Miyuu isdilayaa? waayo. isagaa yidhi, Meeshaan tegayo iman kari maysaan. ²³Wuxuu ku yidhi iyaga, Idinku waxaad tihiiin kuwa hoosta, aniguse waxaan ka mid ahay kuwa sare. Idinku waxaad tihiiin kuwa dunidan, aniguse mid kama ihi kuwa dunidan. ²⁴Haddaba waxaan idinku idhi, Dembiyadiinna waad ku dhiman doontaan, waayo, haddaydnaan rumaysan inaan isagii ahay, dembiyadiinna ayaad ku dhiman doontaan. ²⁵Haddaba waxay ku yidhaahdeen, Yaad tahay? Ciise wuxuu ku yidhi, Kii aan tan iyo bilowgii idinkala hadlay. ²⁶Waxaan hayaa wax badan oo aan idinkala hadlo oo aan idinku xukumo, laakiin kii i soo diray waa run, aniguna waxaan ka maqlay isaga, waxaas ayaan dunida kula hadlayaa. ²⁷Ma ayna garan inuu iyaga kala hadlay Aabbaha. ²⁸Sidaas aawadeed Ciise ayaa ku yidhi, Markaad Wiilka Aadanaha kor u qaaddaan, markaasaad garan doontaan inaan isagii ahay iyo inaan keligay waxba samaynaynin, laakiin sida Aabbuhu ii baray ayaan waxyaalahaas ugu hadlaa. ²⁹Oo kii i soo diray ayaa ila jira, keligay igama uu tegin, waayo, mar kasta waxaan sameeyaa waxa ka farxiya isaga. ³⁰Intuu waxyaalahaas ku hadlayay, dad badan ayaa rumaystay saga.

8:21-22 “Meeshaan tegayo iman kari maysaan... Miyuu isdilayaa?” Su, aasha aayadda 22 waxay filaysaa jawaabta ah “maya.” Tani waxa ay ka mid tahay markii hore qoraalada in kasta oo ay is fahan la yihiin waxii uu yidhi (cf 7:34 -36) waxa ay la xidhiidhaa isaga dhimashadiisa waxa laga soo qaatay. Marka aan ka halayno Josupuhus waxa aan ka baranaynaa qaybaha ugu hooseeya of Hade. Tani na waxa ay inoo cadaynaysaa su, aasha laga qabo waxa ay tahay meesha uu ahaan doono Ciise Masiix.

8:21 “ku dhiman doontaan dembigiinna” macneheedu waxa weeyi “denbigiinna waad u dhiman doontaan” mar kalena waxa uu yidhi “dembigu ” waxa uu yahay mid mid ah marka aad eegto aayada 21 waxa ay ka hadlaysaa jamac iyo tan 24 kuna waxa ay ka hadlayaan sidii uu aas aas ahaan loogu diiday Masiixa Ciise (aayada 4) tani runtii waxa ay ah mid ay naan awoodin culayskiisa dembiga calaamada Injiilka. Ku wii hogaamiyayaasha ahaa waxa ay diideen Ciise inuu qataan iftiinkii weynaa ee uu sii hor dhigay iyo weliba eraygiisii iyo calaamadihiisii.

Fiirooyinkan soo socda ka eeg fasiraaddayda Markos.

Markos 3:29 “ku alla kii caaya Ruuxa Qoduska ah, ” waxa loo fahmi kara ka hor wakhtigii Bentakostiga, waxaana loo adeegsaday diidmada runta Ilaah. waxbarista aayaddan guud ahaan waxa lagu magacaabay “denbiga aan cudurdaarka lahayn.” waxaana lagu tarjumi karaa qaabka sidan ah:

1. Axdiga Hore dhexdiisa waa farqiga u dhexeeya denbiga kama’ a ah iyo ka kasta ah (cf. Tirintii 15:27-31)
2. Kuwa aan rumaysnayn Ciise Masiix iyo kuwa qoysaskooda ka mid ah ee aan rumaysadka lahayn waa Faarisiyiinta e sida ay qoraaladu sheegayaan.
3. Odhaayada cafiska ee aayadda 28
4. Kala duwanaanshaha u dhaxeeya Injiilka iyo tusaalayaashiisa. Sida runtii ah “wiilka aadanaha” (cf Matayos 12:23) (Luukos 12:10) waxa ay leedahay “wiilashii bani-aadanka” (cf. Matayos 12:31 Markos 3:28).

Iftiinku waxa uu ahaa mid sare, dembigana waxaa galay kuwa, kuwii xitaa iftiinka weyni hortood joogay iyaga oo fahmaaya Ciise sida uu Ilaah u yahay waxa ay tahay mid la inoo muujiyey inaynu ku badbaadno . Waxa ay noqdeen kuwo ka leedahay iftiinka Injiilka iyaga oo raacay shaydaan iyo weliba iftiinkiisa (cf. Markos 3:30). Waxa ay diideen qirashada (cf. Yooxanaa 6:44, 64:65) dembiga culayska lihi ma aha inaynu Ilaahay diidayno sababta oo ah tani waxa ay tahay mid keliya iyo ficilada erayga. Laakin tani waa mid sii socota, iyada oo ay weli jirto kuwii Ilaahay diidanaa iyo Ciiseba, iyaga oo aan si buuxda u rumaysnayn. (i.e kuwani waa qoraalada iyo aayadaha)

Haddaba dembiga oo keliya gaar ahaan kuwa soo gaadhsiiyey Injiilka. Iyo weliba kuwii maqlay Injiilka kaas oo ku saabsanaa iyada oo ay in tooda badani diiday. Sida runtii ah tani waxa ay tahay arin khaas ah oo casriya dhaqanada ayaa waxa ay saamayn ku leeyihiin Injiilka, laakiin kuwaasi waxa ay diideen Ciise (I, , e Maraykanka dhaqanada reer galbeedka.

8:23 “Idinku waxaad tihiin kuwa hoosta, aniguse waxaan ka mid ahay kuwa sare.” Kani waxa uu ahaa tusaale kale (i.e korka, vs hoosta, cf 7:35-36-18:36).

Waxyaabaha uu Ciise ku diiday Ciise inuu yahay kan samada ka yimi oo ay Yuhuuduna yihiin kuwo hoose. Taasina waxa ay ka timi habka kala duwanaanshaha u dhexeeya Injiilka. Calaamadaha Injiilka (Matayos, Markos, Luukos,) waxaa jiray la kala duwanaansho ah xiliyadii Yuhuuda , shaydaanka ayaa xiligaas waxa uu soo bandhigaayey mustaqbalka iyo xiliyadiisa.

Iyo xaqnimada. Waxyaabaha ay ku kala duwanaayeen waxa ay ahaayeen, laakin miyuu Ciise baray labada kala duwanaansho? Waxaa laga yaabaa inay kuwani ahaayeen wixii uu Ciise dadka hortiiisa ku baray markii ay kuwa yuhuuda ahi dadka wax ku barayeen si khaasa xagga anshaxa iyaga oo xer ka dhigaaya.

▣ **“Idinku waxaad tihiin kuwa dunidan”** dunidan aan ku nool nahay waxa ka buuxa xoog ay samaynaayan kuwo ku nooli. (cf 2 Korintos 4:4 Efesos 2:2 iyo weli ba Yooxanaa 5:19) dunidan oo dhami (*Kosmos*) eeg Mawduuca Gaarka ah 14:17.

8:24 “haddaydnaan” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah loogalana jeedo waxqabad.

▣
NASB, NKJV “rumaysan inaan isagii ahay”
NRSV, JB “rumaysta inaan isagii ahay”
TEV “rumaysta ka aan ahay”
NJB “rumaysta inaan isagii ahay”

Tani waxa ay ahayd fariintii ugu weynayd ee uu yidhi Ciise waxa ku saabsan sidii ay isaga qudhiisa u fahmi lahaayeen asal nimadiisana u qeexi lahaayeen (amaba ay tani suuro gal u noqon lahayd sida ay qoraaladu leeyihiin “Messiah” tani waxa ay la xidhiidhaa . waxaa lagu isticmaalay Axdiga Hore ciwaanka YHWH (cf. “aniga” Baxniintii 3:14).Tani waxa ay tahay mid aad caan u ah “aniga” fariintaasna waxa aan ka helaynaa Yooxanaa. Tani ma aha qaar la saadaalin karo. (cf 4:26, 6:20 8:24 , 25, 58, 13, 19 18:5 , 6.8). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23.

8:25 “Yaad tahay?” kuwii haddabaYuhuuda ahaa waxa ay raadinayeen sida ay hoos ahaan wax uga bedeli karaan (cf. Matayos 26;57-68 Markos 14:43-65)! Iyagu isaga ayey aadeen iyaga oo doonaaya inay dilaan. Iyagu ma ay raadinayn war war laakiin waxaa ay eedaynayeen. Ciise Qudhiisa ayaa waxa uu isku muujiyey Yooxanaa (mana uu jeclayn kuwa Synoptic)! Isaga eraygiisa (i.e aayada 24) (i.e In la bogsiiyo Maalinta Sabtida) tan si cad ayaan u arki karaynaa.

▣
NASB “Kii aan tan iyo bilowgii idinkala hadlay.”
NKJV “Wixii aan idin idhi oo keliya ilaa iyo bilowgii”
NRSF “maxa gebi ahaanba idinkula hadlayay”
TEV “Maxaan markii ugu horaysayba idiin sheegay”
NJB “Maxay ahaayeen wixii aan markii horeba ka hadlay”

Runtii guud ahaan Giriiga iyo qoraaladoodu kama helayso wax ka dhexeeya. Sidaas daraadeed erayadan waxaa loo qaybin karaa siyaabo kala duwan iyada oo ay halkaas ku samaynaayan erayo kuwaas oo si wanaagsan

u leeg qoraalada. Daabacaadaha kala duwanina islama xidhiidhaan waxa badan ayay ku kala duwan yihiin. Laakiin halkan waxa jira xulasho.

1. *Hote*- waxa aan idin idhi bilowgiiba (NASB, NKJV, TEV NJB, NIV,)
2. *Ho*-ti sida ay Samatigu sharaxayaan –waxa aan guud ahaanba idinkala hadlayaa (NRSF, TEV waxa ku qoran)

Haddaba tani waxa ay ahayd eryadii Yooxanaa waxayna qayb ka qaadanaysay ilaa mudo ah “Bilowgii” waxaana tan lagu isticmaalay turjumaada septuaging oo ka helayso Bilowgii 1:1 (abuurista) iyo Yooxanaa 1:1 (isaga shaqadiisii) Ciise waxa uu ahaa “Bilowgii” wuxuuna waxyaabahan oo dham mudo dheer ugu sheegaayey erayadan iyo weliba ficilo.

8:26-27 erayadani in badan ayaa Yooxanaa lagusoo dhex celceliyay adkayn aawadeed

1. Aabaha ayaa isoo diray aniga (cf. 3:17, 34, 4, 34 5:36 38, 6;29 44;477;2829;8-16, 26, 42 10:36, 11;42 10:36 12, 49, 14, -24, 15:21 17, 3 18, 21, 23, 25, 20:21).
2. Aabuhu waa Run (cf. 3 :33-7:28)
3. Ciise waxaa wax baray Aabaha (3:11; 7:16-17; 8:26, 28, 40; 12:49; 14:24; 15:15).
4. Ciise wuxuu muujinayaa Aabbaha (c.f.1:18, 8:26 29:12, 49-50, 14, 50, 14, 7, 9)

▣ **“Dunida”** eeg fiirada 1:10.

8:27 Waxyaabo kale ayuu inooga sheega qoraaga hadii ay si fiican u fahami lahaayeen waxa ay garan lahaayeen cabiraada iyo calaamadaha luqadaha, waa ay, jecel yihiin, kuwa kale ee Masiixiyiinta ah, waxa ay ka daaleen inay dilaan Isaga (cf 5:18, 8:59 10:33). Isagu waxa uu isku eedeeyey inaanu ahaan mid aan is qararin!

8:28 “Markaad Wiilka Aadanaha kor u qaaddaan,” kuwani waxa ay ahaayeen Tusaalayaal la Kitaabka Axdiga Hore ahaa Baxniintii 21:4-9, taas oo ahayd mid lagaga hadlay Kitaabka Yooxanaa 3:14. Tanina waxa ay ahayd xiligaasuu noolaa Yooxanaa, waxayna lahayd laba micnood. Taasina waxa ay loola jeeday “in kor loo qaado” sidii isaga loogu qodbay isku talaabta (cf.3:1424:32, 34). Laakiin tani waxa ay ahayd xiligii la “mastaafuriyey” haddaba marka aan eegayno” sida ku qoran Falimaha rasuulada 2:33, 5:31 (Filiboy 2:9). Ciise waxa uu garanaayey inuu dhimanaayo (cf. Markos 10:45).

▣ **“Wiilka aadanaha”** Kaasi waxa uu ahaa Ciise –oo naftiisa loo doortay. Sababtuna waxa ay ahayd isagu ma uulahayn ciidan iyo weliba guud ahaanba waxyaabao cadaynaya inuu Yuhuuda xidhiidh la leeyahaykuwaas oo haysta Madhabta loo yaqaano Judaisam. Ciise Magacaas ayaa la siiyey waayo taasi waxa ay cadaynaysay laba arrimood oo ku saabsan isaga is hoosaysiintiisii (cf.Yexesqeel 2:1, Sabuurka 8:4) iyo isaga dhimashadiisii (cf. Daanyeel7:13).

▣ **“markaasad garan doontaan inaan isagii ahay”** Xitaa xertiisu si buuxda umay fahmin ilaa (7:39) kadib maalintii Betakostiga! Haddaba Ruuxaasi waxa uu yimi Markii ay indhaha- fureen iyo weliba dhegah! Kuwaas oo si cad u cadaynaaya waxyaabaha ku saabsan naxwaha “Anigu waxa aan ahay Isaga” waxa aad eegtaa waxa ay leeyihiin fiirada aayada 24. Waxa ayna garan doonaan.

1. Kan uu isagu yahay (i.e Messiah)
2. In Isaga uu Aabuhu u muujiey (cf. 5:19:20)
3. Inay Isaga iyo Aabihii yihiin mid (aayada 29).

8:29 “keligay igama uu tegin,” Ciise waxa uu xidhiidh la lahaa Aabaha Isaga ayaana ahaa qaabeeyaha (cf. 8:16, 16, 30). Taasina waa waxa ay u tahay inay jiraan is wehelyo aad u jaban kuwaas oo wadaagid la leh isku talaabta kuwaasina aad eeyey ugu adag yihiin Isaga. (cf. Markos 15:34).

8:30 “dad badan ayaa rumaystay saga.” Waxaa jira qaar badan oo isticmaalaaya waxyaabahaas “Rumaysad” marka la fiiryo fariintaas, waxayba u muuqataa fariintaas inay yihiin kuwo liqaya rumaysadkooda oo ay kuwaasina ay ka mid yihiin waxyaabihii ay maqleen. (Cf. Matayos 13: Markos 4). Qaar badan ayaa waxa ay ka fekarayeen inuu yahay Messiah kaas oo ku salaysan waxa ay fahami karaan maxaa haddaba tani la micno tahay?qoraaladaas :30-58) kuwaasi waxa ay ku tusayaan inaanay ahayn kuwo run ah oo Masiixiyiin ah (cf. 2:23-

25). Yooxanaa dhexdiisa waxa jira heerar kala duwan oo rumaysadku leeyhay, dhammaantoodna badbaadada maaha kuwo wada keeni kara. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23.

NASB (UPDATED) TEXT: 8:31-33

³¹Sidaas aawadeed Ciise wuxuu ku yidhi Yuhuuddii isaga rumaysatay, Haddaad hadalkayga ku sii socotaan, runtii waxaad tihiiin xertayda. ³²Oo waxaad garan doontaan runta; runtiina waa idin xorayn doontaa. ³³Waxay ugu jawaabeen, Farcankii Ibraahim baannu nahay, oo weligayo addoommo ninna uma ahayn. Maxaad u leedahay, Waa laydin xorayn doonaa?

8:31 “Haddaad hadalkayga ku sii socotaan” Haddaba tani waxa ay tahay jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah taas oo ah micne khaas ah ficil ahaan. Kaasina waxa uu sii wadaa micne soconaaya haddaba rumaysadku waxa uu aad u muujinayaa Kitaabka Yooxanaa 15. Kuwani waxa ay yihiin kuwo ay Ilaa ween kuwa Masiixiyiinta ahi sidii kuwa wacdiyaasha ah ee wacdiyaasha ahi Injiilka dadka u gaadhsiiin lahaayeen. Eraygu waxa weeye in la rumaysto (cf. 5:24), adeecidu, waa inay ahaataa nolosha weligeed ah. waa inaad eegtaa mawduuca khaaska ah sida Yooxanaa 2:10.

MAWDUUC GAAR AH: U BAAHNAANTA SII SOCOSHADA

Way adag tahay in la qeexo madhab yada baybalka ee nolosha Masiixiyiinta maxaa yeelay waxaa loo muujiyey laho ahaan kuwo galbeedka ku xiran. Labadan hab waxaad mooddaa in ay iska hor imanayaan laakiin weli waa isla baybalkii. Masiixiyiinta Galbeedku waxay go'aansadeen in ay doortaan midh qura oo ay ka istaagaan tii kale ee taa liddiga ku ahayd. Bal aan sharraxaad ka dhiibo.

- A. Badbaadadu ma go'aanka koowaad ee Masiixa la aaminaa, mise waa nolol lagaa rabo in aad weligaa xernimo u diyaar ahaatid?
- B. Badbaadadu ma doorashaa halkii ay noqol lahayd nimco Ilaaha Weyn nooga timid mise rumaysadka iyo tawbadkeenka aadanaha ayaa u ah jawaab lagu helo deeqda rabbaaniga ah?
- C. Ma hal mar baa la helaa badbaadada, oo macquul ma aha in la lumiyo, mise waxaa jirta baahi loo qabo in si joogto ah loo wado.

Arrintan dulqaadashadu waa mid weligeed ka soo dhex jirtay taariikhdiis kaniisadda. Dhibaataadu waxa ay si toos ah uga bilaabanaysaa isku dhacyada qoraallada sida tooska ah isaga hor imanaya ee Axdiga Cusub:

- A. Hubsashada qoraalka
 - a. Hadalladii Ciise (Yooxanaa 6:37; 10:28-29)
 - b. Hadalkii Bawlos, (Rooma 8:35-39' Efesos 1:13; 2:5,8-9; Filiboy 1:62:13; II Tesaloniika 3:3 II Timoteyos 1:12; 4:18)
 - c. Hadalkii Butros (I Butros 1:4-5)
- B. Qoraallada loo baahan yahay in ay sii socdaa
 - a. Hadalladii Ciise (Matayos 10:22; 13:1-9,24-30; 24:13; Markos 13:13; Yooxanaa 8:31; 15:4-10; Muujintii 2:7,17,20; 3:5,12,21)
 - b. Hadalladi Bawlos Rooma 11:22; I Korintos 13:5; Galatiya 1:6; 3:4; 5:4;6:9; Filiboy 2:12; 3:18-20; Kolosay 1:23)
 - c. Hadalladii qoraagii Cibraaniyada (2:1; 3:6,14; 4:14; 6:11)
 - d. Hadalladii Yooxanaa (I Yooxanaa 2:6; II Yooxanaa 9)
 - e. Hadalka Aabbaha Muujintii 21:7)

Badbaadada Baybalku waxa ay ka soo baxdaa jacaylka, naxariista, iyo nimcada Ilaah weyn ee qaadirka ah. Ma jiro aadane badbaadi kara haddii aanu Ruuxa Qudduuska ahu ku toosin (cf. Yooxanaa 6:44,65). Barashada Kitaabka ayaa marka hore timaadda oo arrinta ayey hagaajisaa, laakiin waxay ku xiran tahay hadba sida aadanuhu uga jawaabo iimaanka iyo yawbad keenka, bilow ahaan iyo joogto ahaan labadaba. Ilaah wuxuu aadanaha kula shaqeyaa xiriir axdi leh. Ahmiyado iyo masuuliyado ayuu leeyahay labadaba oo ku jira!

Aadanaha oo dhan waa loogu deeqay badbaadada. Dhimashadii Ciise waxa ay la macaamishay dhibaataadii dembigii aadanihii dhacay. Ilaah waddo ayuu siiyey wuxuuna kuwa isaga araggiisa ka abuurin oo dhan ka doonayaa in ay gartaan jacaylkiisa iyo shaqadiisa weyn ee uu noogu qabtay Ciise Masiix. Haddaad jeclaan

lahayd in aad aqrisid in badna oo maaddadan ku saabsan adigoon wax jaraa oo madhabtra Calvin ah ka sugayn , ka eeg

1. Dale Moody, *The Word of Truth*, Eerdmans, 1981 (PP 248-365)
2. Howard Marshall, *Kept by the power of God*, Bethay fellowship, 1969
3. Robert Shank, *Life in the Son*, Westcott, 1961

Kitaabka Qudduuska ahu labo dhibaato oo kala wuan ayuu meeshan ku sheegayaa: In aad hubsashada u qaadatid sidii sharci wax kuu fasaxaya waa in lagu noolaado mro la'aan iyo nolol danaystenimo (2) iyo adigoo ku dhiirri gelaya kuwaa iyagu la hardamaya hawsha iyo dembiyadooda shaqsi ahaaneed. Dhibaatadu waxaa weeye in kooxaha qaldani ay qaadanaayaan fariin qaldan oo ay sidaas hab qaab climiyeed aan fadhin ku sameeyaan iyagoo qayb yar oo xadaysan oo Kitaabka ah. Masiixiyiinta qaar ayaa si aad u daran ugu baahan fariintan hubsashada, halka kuwo kale ay uga baahan yihiin digniino ad-adag! Kooxdee ayaad adigu ka tirsan tahay?

▣ **“runtii waxaad tiihin xertayda.”** Ciise waxa uu xusay qaab nololeedka iyo adeecida (iyo isaga amaradiisa cf. aayadaha 51, 52, 55, 14:15, 21, 23, 24, 15, 10, 20, 17:6 Lukos 6:46 2yooxanaa 9). Haddaba sida Shema waa eray Cibraaniya kaas oo uu macnihiisu yahay “inaad maqasho isla markaasna aad sidaas samayso” (i.e. Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-6).

8:32 “waxaad garan doontaan” Tan waxaa lagu isticmaalay Kitaabka Axdiga Hore “ogaashol” kaas oo uu macnihiisu yahay “xidhiidhka aan shiqsiyaadka la leenahay” ma ah sida “Runta jirta” (cf. Bilowgii 4:1 Yeremyaah 1:5). Runtu waxa weeye qofka! Ayaadaasi, haddaba ayadaasi waxa ay tahay mid si quman looga helaayo sharciga barashada , kaas oo ah mid aan la xidhiidhin cabiraada bani-aadanka iyo aqoontooda, Taasina waxa ay tahay mid qabinaysa balaadhinaysana taas oo anaan ahaym mid xor ah, bani-aadanku. Haddaba “runtu” waxaa lagaga hadlay halkan taasina waa Injiilka iyo shiqsiyada Sayid Ciise Masiix. Haba ma jirto runka kale, iyo nabad, iyo rajo taas oo aanu Isagu ka mid ahayn!

8:32, 40 44, 45, 46, “Runta” kani waxa weeye furaha qoraalada. Kuwanina waxa ay ka kooban yihiin laba.

1. Inaan si xoogan u rumaysano
2. Runta waxa ka soo horjeeda ama been ku lug leh

Labadan arrimood ba waxa ay ku lug lahaayeen iyaga oo run ah shaqadii wacdinta ee Ciise Masiix. Isaga ujeedadiisu waxa ay ahayd Injiilka. Runtuna aas aas ahaan waxa ay ahayd shiqsiyadiisa. Ciise waxaa inoo muujiyey qof nimadiisa Aabaha. Aayadaas waa mid aan inta badan ka heli karo qoraalada iyada oo loo isticmaalay qaab wax barasho. Xaqiiqaduse runta ahi se waxa ay tahay, inaan ilaa iyo hada cadaymo badan oo run ah hayno. Midna xor lagama dhigan (cf. Sefanyaah 1:8) waxa aad eegta Mawduuca Gaarka ah ee ka hadlaaya runta 6:5 iyo 17:3.

8:32 “waa idin xorayn doontaa.” kuwa rumaysadka lihi waxa ay xor ka yihiin sharciga, waxayna noqonayaan kuwo diyaarsan, fahmina kara waxa ay diimuhu yihiin. Ilaa iyo hada kuwa masiixiyiinta ah ee xorta ah waxa ay yihiin kuwo ka ino dho xidhan marka aan fiirino waxa uu leeyahay injiilku (cf. Rooma 14:1-15:6; 1Korintos 8:10).

8:33 “Farcankii Ibraahim baannu nahay, oo weligayo addoommo ninna uma ahayn” tani waxa ay tahay mid aad la yaab u leh sida kuwa xag jirka ay indho la, aantoodu noqon doonto. Maxay ahaayeen Egypt, Syria, Babylon, Persia Greece, Syria iyo Rome?

NASB (UPDATED) TEXT: 8:34-38

³⁴Ciise ayaa ugu jawaabay, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii kasta oo dembi sameeyaa waa addoonkii dembiga. ³⁵Oo addoonkuna guriga kuma sii jiro. wiilkuse waa ku sii jiraa weligiis. ³⁶Sidaas aawadeed haddii Wiilku idin xoreeyo, runtii xor baad ahaan doontaan. ³⁷Waan garanayaa inaad farcankii Ibraahim tiihin, laakiin waxaad doonaysaan inaad i dishaan, waayo, hadalkaygu meel idinkuma haysto. ³⁸Waxaan xaggii Aabbahay ku soo arkay ayaan ka hadlaa, idinkuna waxaad samaysaan wixii aydin aabbihiin ka maqasheen.

8:34 “Kii kasta oo dembi sameeyaa waa addoonkii dembiga.” Ciise waxa uu isku dayey inuu hogaamiyo taasina waxa ay ahayd runta xagga ruuxa ee ka dambaysay aayadihii hore aan hore u soo aragnay “xor ayuu idnka dhigi doonaa” aayada 32. Taasina waxa ay odhanaysaa aayada 33 waxa ay ina tusaysaa inaanay is fahmi Karin. Haddaba odhaadaasi waxa ay u dhexaysaa sidii uu Ciise sida adag uu ugaha halay meelaha qaar aayada 21 iyo tan 24 waxa uu ku cadeeyey hadhxidhaalayaashan aan ka helayno aayadaha 44:47.

Hadda sida Frank Stagg uu ku cadeeyey *New Testament Theology* “dembiga bani-aadanku waxa uu noqday carqalad markaas isaga doonistiisa ayaa xor la inaga ga dhigay ” (p.32).

Haddaba halkan Ficilku waa fal taagan “samayn” taas oo ka hadlaysa inaanu dembigu sii socon. Marka aynu dembiga ku sii soconaa waxa ay cadayn u tahay inaanu midna “ogayn” runta Ciise. Hadaba mid taas la mid ah waxaa lagu isticmaalay “dembiga” 1 Yooxanaa 3:6-9

Waxa haddaba ay is weydiintu tahay “miyey kuwa masiixiyiinta ahi ilaa iyo iminka dembaabaan”? jawaabtu waa waxa ay noqonaysaa “haa” (cf. Rooma 7:1 Yooxanaa). Kuwa masiixiyiinta ahi waxa ay la tacaalayaan dembiga laakiin kuwa lumay tan looma muujin miyaanay tan aqoonsan Karin!

The NET Bible (p 1921 #21) waxa uu ku darayaa war bixin wanaagsan wax qoraalada ah oo ka hadlaaya dembiga sida 1 Yooxanaa xitaa tan ma rumaysna (dembigu waa dhimashada)

8:35 haddaba aayadani si toosa ulama xidhiidho aayada 34 xitaa ta 36 Ciise ma aha Muuse iyo Yuhuuda iyo diintooda Juudiisamka, waxa weeye wiilka saxa ah (cf. Cibraaniyada 1:2, 3, 6 5;8, 7:28). Waxa aan rumaysad ku yeelanaynaa isaga oo keliya tani ma aha inaan soo bandhigno sharciyadu halka ay ku dhamaanayaan tan, ayaan ku noqon karaa xor (cf. 32).

▣ “**weligaa**” eeg Mawduuca Gaarka ah 6:58.

8:36 “haddii ” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah kana hadlaysa fal.

8:37 “laakiin waxaad doonaysaan inaad i dishaan, ” (cf. 5:18 7:1, 19 , 8:37, 40 :11 , 53,).

▣ “**waayo, hadalkaygu meel idinkuma haysto.**” Aayadahan waxa aan ka fahmi karaa waxyaabo kala duwan. Taas oo si wacan inooga caawinaysa the Bible in Twenty Six Translation

1. “Sababta oo ah eraydada ayaa idinka dhigay xor idinka” American Standard Version
2. “dshibtu idinma saamayn idinka” *The New Testament* , by Henry Alford
3. “ma jirto wax adag idinka dhexdiina” *The New Testament: A New Translation* by James Moffatt
4. “meel aniga iguma laha” *The Emphasized New Testament: A New Translation* by J. B. Rotherham .
5. “sababta oo ah eraydadu meel idinkuma laha qabiyadiina ” –*The Four Gospels* by E.V. Rieu

Markale dhibku waxa weeyi aqbalitaanka ama aqbalid la’aanta injiilka, waana arrin ku salaysan badbaadada.

8:38 “ku soo arkay” tani waxa ay tahay faljooga tan oo ah mid la xidhiidha Ciise isaga jiri taankiisii- iyo xidhiidhkiisii isku imaanshaha uu la lahaa Aabaha. (cf. ayaada 40:42).

▣ “**Waxaan xaggii Aabbahay ku soo arkay ayaan ka hadlaa**” marka ugu horaysa waxaa halkan lagu xusay “Aabaha ” waxaa laga yaabaa inay tani la xiriiro yuhuuda dhaqan ahaan (cf. Ishaaciyaah 29:13). Haddaba si kastaba ha ahaatee, aayada 41-44 waxa weeye faacil waana mid ay cadaynayso Shaydaanku|Xumaanta, in ay yihiin ujeedoodu, ficiladoodu, iyo erayadooduba ka soo qaad inay ina taageerayaan “Muuse ” waxa uu si cad u tusay waxa uu yahay xagga Ruuxa. Haddaba bani-aadanku ma madax banaan karaan dhibaarada ruuxa. Halkan waxa aan ka helaynaa laba arimood kuwaas oo ku leh saamayn (diidmo) –Ilaah|Masiixa|Ruuxa| iyo Kiisa sidee ayuu mid uga jawaabayaa Injiilka. (cf. 1, 12, 3:16, 10:1 -18, 14:16) Waxa ay tani muujinaysaa saamaynta xagga Ruuxa!

Waxaa jira waxoogaa qoraalo ah lan xidhiidha aayadahaas

1. Labaduba waxa ay la xidhiidhaan “Aabaha” kuwanina waxa ay la xidhiidhaan YHWM
2. Falku waa amar mana aha tusmayn

(Eeg Bruce M.Metzger, *A Textual commentary on the Greek New Testament*, pp.225).

NASB (UPDATED) TEXT: 8:39-47

³⁹Markaasay u jawaabeen oo waxay ku yidhaahdeen, Aabbahayo waa Ibraahim. Ciise ayaa ku yidhi, Haddaad carruurtii Ibraahim tihiin shuqullada Ibraahim waad samayn lahaydeen. ⁴⁰Laakiin hadda waxaad doonaysaan inaad i dishaan, anoo ah ninkii idiin sheegay runtii aan xaggii Ilaah ka maqlay. Waxaas Ibraahim ma uu samayn jirin. ⁴¹Waxaad samaysaan shuqullada aabbihiiin. Markaasay ku yidhaahdeen, Annagu kuma aannu dhalan sino. Aabbe keliya ayaannu leennahay oo waa Ilaah. ⁴²Ciise wuxuu ku yidhi, Haddii Ilaah aabbihiiin yahay, waad i jeclaan lahaydeen, maxaa yeelay, Ilaah baan ka soo baxay oo ka imid, aniguna iskama iman, ee isagaa i soo diray. ⁴³Maxaad hadalkayga u garan weydeen? Waayo, hadalkayga ma maqli karaysaane. ⁴⁴Idinku waxaad tihiin kuwo aabbahood Ibliska yahay, oo waxaad doonaysaan inaad samaysaan damacyada aabbihiiin. Tan iyo bilowgii wuxuu ahaa mid dhiig qaba. runtana kuma uu joogsan, waayo, runtuna kuma jirto isaga. Markuu been ku hadlo, tiisuu ku hadlaa, waayo, waa beenaaleh, waana beenta aabbaheed. ⁴⁵Laakiin runta aan ku hadlo aawadeed waad i rumaysan weydeen. ⁴⁶Midkiinnee baa dembi igu caddaynaya? Haddaan runta sheego, maxaad ii rumaysan weydaan? ⁴⁷Kii Ilaah kuwiisa ka mid ah, erayada Ilaah ayuu maqlaa, sidaas daraaddeed idinku maqli maysaan, waayo, Ilaah kuwiisii ma ihidin.

8:39 “Aabbahayo waa Ibraahim” Ciise waxa uu ka halaayey inay ka timi isaga farcankiisii Ibraahim , laakiin waxa uu u sheegay inay qoyskiisa yihiin oo ay wax shaydaanimoo ah samaynayaan (cf. aayada 38:44) qof kasta waxa uu leeyahay rumaysad iyo xidhiidh ma aha inaan noqono kuwo xagg jira oo la aqoonsan karo. Ilaahay isaga ayaa Sameeyey yuhuuda (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa 6:5, 13; Rooma 2:8-29; 9:6)

☐ **“Haddii”** waa jumlad shuruudeed heerka koobaad qaabkeeduna yahay fal taagan oo wax tilmaamaya, laakiin waxa laga yaabaa inay qayb ka noqoto jumlad shuruudeed heerka labaad ah (cf. aayada 19 iyo 42). Waxa halkan inooga cad in laga soo guuriyey Giriig qoraaladan iyada oo ay xaalada ahaan isku qasnaayeen markii horena wax laga bedelay VERB iyo IMPERFECT. Haddii aan sidaas ka akhriyey “Haddii aad tihiin caruurtiisii , amaba aydaan ahayn , markaas ka dib waa inaad samaysaan wixii Ibraahim sameeyey , laakiin ma tihidin ” UBS kuwnai waxa ay ina siinayaan xaalado isku qasan marka aan eegno “B ” (kuwaasi inta badan waa ay kala duwan yihiin).

8:40 “ninkii” Ciise oo keli ahi ma uu ahayn ka ahaa wakiilka YHWH Laakiin waxa uu ahaa qof bani-aadan ah. tani waxa ay ka soo hor jeedaa kuwa dadka waxa beenta ah baraya kuwaasina waa assertion the in ternal dulisam kuwaas oo u dhexeeya ruuxa iyo qaabka ay leeyihiin shayadu (1Yooxanaa 1:4 , 4 1-4)

MAWDUUC GAAR AH: GONOSTISIISAMKA

- A. Waxa ugu badan aqoonteena ee caqabada ahi waxa ay ka yimaadeen Gnostic wixii ay qoreen marka aan eegno qarnigii 2. Haddaba si kastaba ha ahaatee, tani waxa ay ahayd fekrad taas oo soo baxday qaniyadii hore ee la joogay (Dead Sea Scrolls) kuwaas oo uu qoray rasuul Bawlos
- B. Haddaba marka aan eegno dhibaataadii Efesus (I Temoteyos), Cret (Tiitus) iyo (Kolosay) waxa ay ahaayeen kuwo isku qasan oo ay isticmaali jireen kuwii hore Gnosticism ka ahaa ee sharciga Yuhuuda ku dhaqmi jiray.
- C. Qaar waxa ay ahaayeen teendhooyin la sameeyey xiligii Gnosticism ee qarnigii labaad
 1. Wax walba oo xagga ruuxa ah (kuwaasi waxa ay ahaayeen kuwii xagg jiray” waxayna samayn jireen waxyaabo xun xun, ruuxyada wanaagsan. Ilaah, kaas oo ah mid Ruuxa kuwani ma noqon karaan kuwo inagu ka liifaaya inaan inaan xiliyadan casriga ah samayno wax xun
 2. Waxa aan halkan ka helaynaa waxoogaa qiyaaso ah (*eons* ama waxyaabo la mid ah qaar marxalada malaa,iigta leh) waxani waxa ay ahaayeen Ilaah waxyaabihiiisa . kuwii ugu dambeeyey iyo kuwii ugu hooseeyey waxa ay kuwaasi ahaayeen YWHM ee Kitaabka Axdiga Hore kuwaas oo dhisay jaamacada (*kosmos*)
 3. Ciise waxa uu ahaa mid aan la qiyaasi karayn, sida YWHM Laakiin waxa uu lahaa martabad sare. Runtiina waxa uu ahaa mid aad ugu dhowaa Aabaha. Qaar kood waxa ay dhigeen meesha ugu

saraysa , laakiin waxa ay ka fekrayeen ilaa iyo hadda ma yuu yahay Ilaahay laakiin waxa ay inta badan qiyaasayeen dhimashadiisii (cf. 1 Yooxanaa 1:14). Maadama ay waxyaabahaasi xun yihiin, Ciise ma uu lahayn jidh bani-aadan ilaa iyo haddana ma jirto cid qeexi kartaa. Waxa uu u muuqday mid bani-aadan ah, laakiin waxa uu ahaa mid runtii Ruuxa (cf. 1Yooxanaa 1:1, 3:4:1-6)

4. Badbaadada waxa aan ka helay rumaysadka Ciisena waxa uu ina siiyey aqoon khaas ah. taas oo ay garanayaan oo keli ahi dad khaas ah oo aqoon leh (Furayaashiisa or passwords) kuwaasi waxa ay ahaayeen kuwo soo dhaafay waxyaabaha xagga jannada ka jira. Yuhuudu waxa ay ahaayeen kuwo ku dhaqma sharciga xitaa tan waxa ay ahayd mid laga codsanaayey inay ku gaadhaan Ilaahay.
- D. Kuwan haddaba ahaa Gnostic waxa ay ahaayeen macalimiin kuwaas oo dadka u sheegaayey laba wax oo iska soo hor jeeda oo ay isticmaalaan kuwa aan waxba rumaysnayni.
 1. Qaar kuwaas ka mid ah qaab nololood koodu waxa uu la xidhiidhay guud ahaanba badbaada. Kuwani badbaada iyo ruuxuba waxa ay ahaayeen kuwo qarsoodiya aqoon ahaan (passwords) Kuwaasina waxa ay ahaayeen malaa,iiga adhi-jiro ah (eons).
 2. Kuwo kalena, noloshoodu waxa ay ahayd guud ahaanba qaar uu ay ku adag tahay badbaadadu. Haddaba buugan waxa, kuwa beenta dadka baraya waxa ay soo qaadanayeen noloshii xiliyadii hore iyaga oo cadayn u soo qaadanayaa badbaadada runta ah (cf. 2:16:23).
- E. Buuga sida wanaagsan uga hadlaaya waa *The Nag Hammadi Library* by James M. Robison iyo Richard Smith

8:41

NASB, NKJV

“Inagu kuma ay naan dhalan sinada”

NRSV

“ Inagu ma nihin caruur aan caqli lahayn”

TEV

“inagu waxa aynu nahay caruur run ah”

NJB

“ inagu ma nihin kuwo caqli, lanaan dhashay”

Tani waxaa laga yaabaa inay tahay mid xidhiidh la leh inta badan aayada 48 (Idinku waxa aad tihiin Samaariyiin). Tani waxa ay ina tusayaasaa inay yuhuudu u malaynayaan inuu Ciise ahaa uun wiil iska caadiya, oo aan guud ahaanba lahaa jinasiyda Yuhuuda. Markaas ka dib waxa ay Yuhuudu ay odhanayeen oo ay soo qaadanayeen inuu Ciise uu Aabihii ahaa Askari Roomaan ah.

☐ **“Aabbe keliya ayaannu leennahay oo waa Ilaah”** odhaahdani waxa ay odhanaysaa kuwo ku ku dhaqmaayey waxii uu odhanaayey Kitaabka Axdiga Hore (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa 43:5, 39; 6:4-5) iyadoo tusaale ahaan ah (Sharciga Kunoqoshadiisa 32:6; Ishaaciyaah 1:2 63:16 64:8). Halkan waxaa jira wax is maandhaafa, waxa ay inoo cadaynayaan kuwan Yuhuuda ahi ee hogaamiyayaasha ahaa inuu Ilaahay yahay hal mid (cf. Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-5). Kuwaasina waxa ay yaqaan sharcigii Muuse kaasi inuu yahay ka sida quman Ilaahay ay ugula xidhiidhayeen. Ciise waxa uu sheegay inuu joogo midigta Ilaahay taasi ma ay ahayn mid sharciga ku xidhan. Laakiin waxa ay ahayd rumaysadka ay leeyihiin shiqsiyaadku rumaysadkaas oo ay Isaga ku lahaayeen. Tani waxa ay cadaynaysay qirashada iyo sida quman ee ay isaga u fahan sanaayeen. Laakiin iyaga waxaa la jiray Ruuxa iyada oo shaqadii weynayd ee Ciise rumaysadka u keentay!

8:42 “Haddii” waa jumlad shuruudeed heerka labaad ah looguna magac daray “xaqiiqda liddigeeda.” Haddii Ilaah yahay Aabihii maahee, waad I jeclaan lahaydeen, mana samaysaan (aayadda 47).

8:43 “Waayo, hadalkayga ma maqli karaysaane.” Tani waxa ay la xidhiidhaa xagga Ruuxa waxaana ka helaynaa fahan mana aha waxa ay xagga ruuxa ka maqlayaan dhegahoodu (cf. Ishacyaah 6:9 -10, Matayos 11:15, 13:9 15:16 43; Markos 4:9, 23, 7:16 8:18, Luukos 8:8, 14:35, Falimaha rasuullada 7:51, 28:26-27).

8:44 “Idinku waxaad tihiin kuwo aabbahood Ibliiska yahay” Waxa ay ka bilaabmaysaa odhaahtaa oo ay isweydiiyeen hogaamiyayaashii xagga diinta Isaga ayaamihiisii (cf. Matayos 13:38, Falimaha rasuullada 13:10, 1Yooxanaa 3:8, 10). Waxa ay ahaayeen “xumaan” waxa aad eegtaa mawduuca khaaska ah 12:31.

☐ **“Tan iyo bilowgii wuxuu ahaa mid dhiig qaba”** Tan ugalama joodno inay wax waliba ahaayeen wax xun (i.e cabiraada xagga jirtay) laakiin wax ay soo jeedinaysaa wax ku saabsan jiribaadaha Aadan iyo Xaawa inay

ahaayeen hayada iyaga oo ruuxa been u sheegay iyo abeesadii (cf. Bilowgii 3). Ogow ujeedadu inay tahay mid cadaaynaysa jiri taanka Ilaahay inuu yahay isagu mid run ah. shaydaankuna uu yahay mid xumaan sameeya.

8:46 “Midkiinnee baa dembi igu caddaynaya?” macna ahaan waxa ay sheegaysaa markhaati been ah. Shaydaanku beenbuu sheegaa, laakiin Ciise wuxuu ku hadlaa runta. Waxa uu Yuhuudda hogaamiyayaashooda ugu yeedhay bal inay been ka sheegaan waxbaristiisa! Macnaha halkan ka muuqdaa haddaba, maaha mid la xidhiidha xagga denbiga iyo inuu Ciise bilaa denbi yahay iyo inkale.

Yooxanaa dhexdiisa “denbi” waxa badanaa ka masuul ah shaydaanka oo kasoo horjeeda Ilaah isla markaan caasiyay. Haddaba, denbigu waa wax walba laakiin maaha Ciise, denbiga ugu waynina waa rumaysad la’aanta (16:9).

NASB (UPDATED) TEXT: 8:48-59

⁴⁸Yuhuuddu waxay ugu jawaabeen, Miyaannaan run ku hadlin markaannu nidhi, Reer Samaariya baad tahay, oo jinni baad qabtaa? ⁴⁹Ciise wuxuu ugu jawaabay, Jinni ma qabo, laakiin Aabbahay baan murweeyaa, idinkuna waad i murwad jebisaan. ⁵⁰Anigu ammaantayda ma doono, waxaase jira mid doona oo xukuma. ⁵¹Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Haddii qof uun hadalkayga xajiyo, weligiis dhimasho ma arki doono. ⁵²Yuhuuddu waxay ku yidhaahdeen isaga, Imminka waxaannu garanaynaa inaad jinni qabto. Ibraahim waa dhintay iyo nebiyadiiba, adiguna waxaad leedahay, Haddii qof uun hadalkayga xajiyo, weligiis dhimasho ma dhadhamin doono. ⁵³Miyaad ka sii weyn tahay aabbaheen Ibraahim oo dhintay. Iyo nebiyadii dhintay? Yaad iska dhigaysaa? ⁵⁴Ciise wuxuu ugu jawaabay, Haddaan is-ammaano, ammaantaydu waxba ma aha. Waa Aabbahay kan i ammaanaa. kaad ku sheegtaan Ilaahiinna. ⁵⁵Mana aydnaan garan isaga, laakiinse anigu waa garanayaa, oo haddaan idhaahdo, Garan maayo isaga, sidiinna oo kalaan beenaaleh noqonayaa, laakiinse waan aqaan isaga, hadalkiisana waan xajiyaa. ⁵⁶Aabbihii Ibraahim waa ku rayrreeyey inuu maalintayda arko, wuuna arkay oo ku farxay. ⁵⁷Sidaa aawadeed Yuhuuddii waxay ku yidhaahdeen, Weli konton sannadood ma aadan gaadhin, oo Ibraahim ma aragtay? ⁵⁸Ciise wuxuu ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Intaan Ibraahim jirin anaa ah. ⁵⁹Markaasay dhagaxyo u gurteen inay ku tuuraan, laakiin Ciise waa dhuuntay, wuuna ka baxay macbudka.

8:48 “Reer Samaariya baad tahay, oo jinni baad qabtaa” waxa suurto gal ah in macnaha saxda ah ee erayga Aramaatiga ah ee “Samaritan” in loo luqada Giriigga loogu tarjumay “hogaamiyaha jinniga.” Ciise waxa uu ku hadlay luqada Aramaatiga. Haddaba, haddii hogaamiyaasha diintu ku sheegeen in Ciise awooddiisu ka imanayo jinni, waxa ay taasi tusinaysaa inay been sheegayeen (aayadda 52). In la yidhaahdo Ciise waa Samaariyaan (4:9) ama wuxuu qabaa jinni (7:20; 8:48, 49, 52; 10:20, 21, eeg Mawduuca Gaarka ah 12:31) waxay ahayd iyadoo la odhanayo yaanu qofna dhagaysanin oo ka jawaaba celinin farriintiisa. Kaddibna iyadoo la yidhaahdo “Ibraahim waa aabahayo,” waxay ahayd cudur daar kale oo lagaga cudur daaranayo inaan Ciise farriintiisa laga jawaaba celinin.

8:49 qofna ma rumaysan karo Aabbaha isagoo Wiilka rumaysanayn (1 Yooxanaa 5:9-12); Qofna ma ogaan karo Aabbaha isagoon addeecayn Wiilka (5:23). Haddaba, inkasta oo ay yihiin labo shakhsi oo kala soocan, hadana waxay isku yihiin mid qudha (10:30; 17:21-23).

8:50 “ammaantayda” eeg fiirada 1:14.

8:51, 52 “haddii...haddii” labaduba waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah macnohooduna waa waxqabad. U fiirso addeecitaanku isaga oo ku xidhan rumaysadka (eeg liiska qoraallada aayadda 48).

☐ **“weligiis dhimasho ma arki doono”** waa labo diidmo oo xooggan. Waxa haddaba ay tilmaamaysaa dhimashada ruux ahaaneed (aayadaha 21, 24), mana aha dhimashada jidh ahaaneed (5:24; 6:40, 47; 11:25-26). Waxa kaloo loogala jeedi karaa ka cabsashada dhimashada (1 Korintos 15:54-57).

Fikirka “dhimashada” (*thanatos*) saddex heer ayaa loogu dhex sheegay Kitaabka:

1. Dhimshada ruux ahaaneed Bilowgii 2:17; 3:1-24; Ishacyaah 59:2; Rooma 7:10-11; Yacquub 1:15 (laxidhiidhitaanka Ilaah wuu go’anyahay)

2. Dhimashada jidh ahaaneed, Bilowgii 3:4-5; 5 (la xidhiidhitaanka dunidu wuu go'ayaa)
3. Dhimashada abidka ah, “dhimashada labaad,” Muujintii 2:11; 20:6, 14; 21:8 (la xidhiidhitaanii Ilaah ee go'naa waxa laga dhigay mid weligiis ah)

Dhimashadu waxay liddi ku tahay doonista Ilaah uu ka lahaa makhluuqa ugu heerka sarreeya (Bilowgii 1:26-27).

8:52 tani waxay tusinaysaa inay si qaldan u fahmeen hadalkii Ciise (aayadda 51). Waxay u fahmeen inay la xidhiidho nololaha jidh ahaaneed ee Ibraahim iyo nebiyadii.

8:53 Su'aashani waxay filanaysaa jawaaba ah “maya.” Waa hadal bilowgiisu layaab leeyahay, laakiinse waxay ahayd inuu Ciise sheeganayo

1. Inuu Ibraahim ka waynaa, aayadda 53
2. Inuu ka waynaa Yacquub, 4:21
3. Inuu ka waynaa Yoonis, Matayos 12:41; Luukos 11:32
4. Inuu ka waynaa Yooxanaa Baabtiisaha, 5:36; Luukos 7:28
5. Inuu ka waynaa Sulaymaan, Matayos 12:42; Luukos 11:31

Gebi ahaanba kitaabka Cibraaniyada ayaa wuxuu tusinayaa inuu Ciise ka sarreeyo Muuse, iyo inuu axdiga cusubi ka sarreeyo axdigii hore (eeg fasiraaddayda kitaabka Cibraaniyadda ood si lacag la'aana uga heli karto www.freebiblecommentary.org).

▣ **“Yaad iska dhigaysaa?”** middani waxay ahayd ujeedada! Ciise cidda uu yahay waxay si toosa uga muuqanaysaa aayadda 54 iyo 58 sidaasi darteedna markuu u sheegay waxay isku dayeen inay dhagxiyaan iyagoo ku eedeeyay inuu caytamay (aayadda 59).

8:54 “haddii” waa jumlad shuruudeed kale oo heerka saddexaad ah loogalana jeedo wax qabad.

▣ **“ammaanaa”** halkan waxa loogu adeegsaday iyada oo loogala jeedo sharfid (Rooma 1:21; 1 Korintos 12:26).

8:55 “garan.. garan” erayga ingiriisiidiisa waxa laga tarjumay labo eray oo Giriigga ah waana *ginosko* iyo *oida*, macnaha marka la eegana waa isku mid (7:28-29). Ciise waxa uu garanayaa Aabbaha waxaanu u muujinayaa kuwa isaga raaca. Dunida oo dhammi (xitaa Yuhuuddu) ma garanayaan Aabbaha (1:10; 8:51; 10:3; 17:25).

8:56 “Aabbihii Ibraahim” Waa hadal ku bilaabmaya iyada oo Ciise naftiisa uu ka soocayo “Yuhuudda,” “Sharciga” (8:17), “Macbadka,” iyo xitaa Ibraahim oo awowga ahaa. Waxa jira ka go'itaan Axdiga Hore ah oo muuqda!

▣ **“waa ku rayrreeyey inuu maalintayda arko”** waa hadal tegay oo tilmaana bixinaya. Sidee ama intee in leeg ayaa Ibraahim uu ka fahmay Masiixa? tarjumaado dhowra ayaa middan u tarjuma macne tusinaya mustaqbal. Haddaba, kuwan soo socda ayaa waxa laga soo qaatay *The Bible in Twenty-Six Translations*:

1. “ku farxay inuu arki doono” – *The Emphasized Testament: A new Translation* waxaana leh J. B. Rotherham
2. “wuxuu ku farxay inuu arki lahaa maalintayda” – Revised Standard Version
3. “wuxuu aad ugu faraxsanaa inuu I arko” – *The Berkeley Version of the New Testament* oo uu leeyahay Gerrit Verkuyl
4. “aragtida imaatinkayga” – *The New Testament: An American Translation* oo uu leeyahay Edgar J. Goodspeed
5. “wuxuu ku farxay Ogaanshaha Maalintayda” *The New Testament in the Language of Today* oo uu leeyahay William F. Beck

Sidoo kale *The Analytical Greek Lexicon Revised* oo uu saxay Harold K. Moulton ayaa falka wuxuu u qorayaa isaga oo macnihiisu yahay “doonis aad ah” waxaana lagasoo qaatay Sebtoojantiga (p.2).

▣ **“wuuna arkay oo ku farxay”** tani waxa ay sheegaysaa labo waxyaalood midkood:

1. In Ibraahim wakhtigiisii uu arkay muujin ku saabsan Masiixa (2 Esdras 3:14)
2. Inuu Ibraahim ku noolaa samada oo ogsoonaan Masiixu shaqadu ka hayo dhulka (Cibraaniyada 11:13)

Gebi ahaana hadalka Ciise waxa uu sheegayaa in Aabbaha Yuhuuddu uu hore usii eegay casriga Masiixa isaga oo aad ugu faraxsan, laakiin farcanka haddu wuxuu diiday inuu rumaysto oo farxo! Ibraahim waa Aabbaha rumaystayaasha (Rooma 2:28-29), ee maaha kuwa aan rumaysadka lahayn.

8:57 markale ayaa haddana kuwii dhegaysanayay isagu waxay si khaldan u fahmeen hadalkiisu. Waxa laga yaabaa wareerintani inay ahayd mid kas ah! Manay arkin maxaa yeelay may doonayn inay arkaan!

8:58 “Intaan Ibraahim jirin anaa ah” middan Yuhuuddu waxay u haysteen cay waxaanay isku dayeen inay dhagxiyaan Ciise (Baxniintii 3:12, 14). Waxa ay gebi ahaanba u fahmeen isaga oo sheeganayay inuu Ilaahnimada hore u jirtay (4:26; 6:20; 8:24, 28, 54-59; 13:19; 18:5, 6, 8).

8:59 “Markaasay dhagaxyo u gurteen inay ku tuuraan” Ciise erayadiisu waxay ahaayeen kuwo aad u cad. Isagu wuxuu ahaa Masiixa waxaanu mid la ahaa Aabbaha. Yuhuudda ku sugan aayadda 31 oo sheegtay inay “rumaysteen isaga, ” waxa ay imika diyaar u ahaayeen inay dhagxiyaan (Laawiyiintii 24:16). Haddaba, Yuhuuddan waxa ku adkayd inay aqbalaan farriintan cusub ee Ciise waayo:

1. Isagu umuu dhaqmin sidii ay ka filayeen inuu Masiixu u dhaqmi doono
2. Waxa uu loollan ku sameeyay dhaqankoodii
3. Waxa uu jaha wareer ku riday Ilaahnimadii kelida ahayd ee ay aaminsanaayeen
4. Waxa uu sheegay in Shaydaanku uu yahay aabbahood oonu aabohood ahayn YHWH

Haddaba waxay ahayd qofku inuu “dhagxiyo” ama “aqbalo” isaga, manay jirin wax intaas ka dhexeeyay!

▣ **“Ciise waa dhuuntay, wuuna ka baxay macbudka”** tani waxay ka mid tahay aayadaha mufasiriintu ay ku wareereen haddii tani:

1. Ahayd mucjiso (Luukos 4:30 iyadoo qoraallada halkan wax lagaga daray)
2. Ciise inuu dhex galay dadkii badnaa maxaa yeelay lagama garanayn dadkii Yuhuudda ahaa ee meesha joogay

Waxa jiray jadwal Ilaahi ah. Ciisena waxa uu ogsoonaan inuu u yimid dhimasho waxaanu ogsoonaan sida, goorta, iyo goobta uu ku dhiman doonay. Saacaddiisuna weli may imanin ayay ka dhignayd.

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Yooxanaa 7:53-8:11 asal ahaan ma waxa weeyi qayb ka mida Injiilka Yooxanaa? Sabab?
2. Maxaa ka danbeeya hadalkii Ciise ee ahaa “waxaan ahay nuurka dunida”?
3. Maxay Farrisiintu ugasoo horjeedeen Ciise?
4. Sharraxaad ka bixi adeegsiga erayga “rumays” ee ku sugan aayadda 30 adigoo raacaya macnaha la socda.

YOOXANAA 9

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Bogsiintii ninkii indho la'aanta ku dhashay	Nin Indho la'aan ku dhashay oo iniftiinkii hely	Ciise oo isku nuujinaya in uuyahay iftiinka nolosha	Ciise oo bogsiinaya nin indho la'aan ku dhashay	Dawayntii ninkii indho la'aanta ku dhashay
9:1-12	9:1-12	9:1-12	9:1-2 9:3-5 9:6-7 9:8 0:9a 9:9b 9:10 9:11 9:12a 9:12b	9:1-5 9:6-7 10:19-21 10:22-30
Faarisi Baadhaya bogsiintii	Faarisi bixinaya ninkiila bogsiyey		Faarisi Baadhaya bogsiintii	
9:13-17	9:13-34	9:13-17	9:13-15 9:16a 9:16b 9:16b 9:17a 9:17b	9:13-17
9:18:23		9:18-23	0:18-19 9:20-23	9:19-23
9:24-34		9:24-34	9:24 9:25 9:26 9:27 9:28-29 9:30-33 9:34	9:24-34

Indho la'aanta Ruuxa	Aragtida iyo Indho La'aanta		Indho la'aanta ruuxa	
9:35-39	9:35-41	9:35-41	9:35	9:35-39
			9:36	
			9:37	
			9:37	
			9:39	
9:40-41			9:41	9:40-41
			9:41	

AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga v)g

ADIGA OO RAACAYA UJEEDKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafsiiri lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiirka. Waa in aadan middan ula tegin qof kuu tafsiira..

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

1. Baaragaraaf-ka koowaad
2. Baaragaraaf-ka labaad
3. Baaragaraaf-ka saddeexaad
4. IWM.

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-41

- A. Bogsiintii indhoolaha, waa lagu yaqaanay shaqadii wacdineed ee Ciise, dhawr farsamo oo kale duwan ayaanu u dhamystiray.
- B. Bogsiinta indhoolaha waxay ahayd calaamad Masiixinimo, (cf. Ishacyah 29:18;35:5; 42:7; Matayos 11:5). Muhiimmada bogsiintani leeday waxaynu markiiba ka arki karaa macnaha hadalkii Ciise ee ahaa inuu Yahaya Iftiinka dunida. (cf. 8:12 & 9:5). Yahuudu waxay rabeen calaamo; waxaa la tusay dhawr! Kaliya YHWH ayuunbaa furi kara indhahooda!
- C. Cutubkan waa masaalo laga matalay indholaanta jidhka ee dadka iyo indhalaanta ruuxiga ah ee Faarisiyiinta (cf. aayaada 39:-41; Matayos. 6:23).

NASB (UPDATED) TEXT: 9: 1-12

¹Ciise intuu socday, wuxuu arkay nin indhala'aan ku dhashay. Xertiisu waxay weydiiyeen oo ku yidhaahdeen, Macallimow, yaa dembaabay, ma kan baa mise waa waalidkiis, inuu indhala'aan ku dhasho? ³Ciise ayaa ugu jawaabay, Ninkan iyo waalidkiis midna ma dembaabin, laakiin waa in

shuqullada Ilaah lagu muujiyo isaga. ⁴Waa inaan samayno shuqullada kii i soo diray intay maalin tahay; habeen baa imanaya mar aan ninna shaqayn karin ⁵Intaan dunida joogo, waxaan ahay nuurkii dunida. ⁶Markuu sidaas yidhi, ayuu dhulka candhuuf ku tufay, oo candhuuftii dhoobo ka sameeyey, markaasuu dhoobadii wuxuu mariyey ninkii indhihiisii, ⁷oo ku yidhi, Bax oo ku soo maydho balliga Siloo'am la yidhaahdo (oo fasirkiiisii yahay, Waa la diray). Wuu tegey haddaba oo soo maydhay, markaasuu yimid isagoo wax arkaya. ⁸Sidaa daraaddeed derisyadii iyo kuwii hortii arki jiray inuu miskiin yahay, waxay yidhaahdeen, Kanu miyaanu ahayn kii fadhiyi jiray oo dawarsan jiray? ⁹Qaar baa yidhi, Waa isagii, Qaarna waxay yidhaahdeen, Maya, laakiin waa u eg yahay. Isagaa yidhi, Isagii baan ahay. ¹⁰Sidaa daraaddeed waxay ku yidhaahdeen, Haddaba sidee bay indhahaagu u furmeen? ¹¹Wuxuu ugu jawaabay, Ninka Ciise la yidhaahdo ayaa dhoobo sameeyey oo indhahayga mariyey, oo wuxuu igu yidhi, Siloo'am u kac, oo ku soo maydho, Sidaa aawadeed ayaan tegey, oo markaan soo maydhay ayaan arag helay. ¹²Kolkaasay waxay ku yidhaahdeen, Xaggee buu joogaa? Isaguse wuxuu ku yidhi, Ma ogi.

9:1 “nin indhala'aan ku dhashay” Tani waa tusaalaha kaliya ee daawaynta noocan ah. Ma jiro halkan fursad ay ku dhici karto wax isdabamarin.

9:2 “Xertiisii” tani waa markii kowaad ee la dheego xertiisa taniyo cutubkii 6. Tani waxay noqon kartaa (1) xertii Yahuuda ee lagu sheegay cutubka 7:3 ama (2) labo iyo tobankii.

▣ **“ma kan baa mise waa waalidkiis, inuu indhala'aan ku dhasho”** suaashan waxay dhalisay falaanqayn badan oo ku saabsan cilmiga Ilaah iyo diintiisa. Waa inaan turjumideeda ku salaynaa caqiidadii diimeed ee Yahuuda, mase aha diimahii bariga. Waxaa jira dhawr arrimood oo suurogal ah.

1. Midani waxay noqon kartaa danbi waalid keen galay awgii, kaasi oo ay wadaaddadii diintu ka soo sheeko guuriyeen Bilowgii 25:22
2. Waxay tani noqon kartaa danbi ay galeen waalid ama faracan xigto dhaw ahi inuu saameeyay wiilka aan dhalan (cf. Baxniintii 20:5; Sharciga ku noqoshadiisii 5:9)
3. Waxay tani noqon kartaa xidhiidhka u dhexeeya danbiga iyo cudurka, midan oo caan ku ahayd caqiido diineedi wadaaddad sare. (cf. Yacquub 5:15-16; Yoxaana 5:14)

Tani waxa xidhiidh ah lama laha caqiido diimeedii soo noqonaysay ee bariga ee ahayd dib udhalashada la soo dhashoo tiyoo makhluuq kale la yahay ama wareegii Karma. Tani waxay ahayd qodobdo ay dood wanaagsan ula yimaadeen Yahuudu eeg James W. Sir's scripture Twisting, pp. 127-144.

9:3 aayadani waxay bixinaysaa jawaabta Ciise ka siiyay xerta suaashii ay sheegtay aayada 2. Dhawr arrimood oo dhab ayaa halkan lagu sarbeebay: (1) dadnbiga iyo jirradu si toos isla xidhiidhaan iyo (2) dhibaatooyinka waxaa badiyaa loo ogolaadaa in dhacaaan si loogu muujiyo barakada Ilaah.

9:4 “aniga ... idinku” kuwan MAGAC U YAALADA AHI sida muuqata isma waafaqsana. Dhawr qoraal qaadiimi Giriiga ah ayaa badelay mid ama ka mida kale keenay is waafaqid xagga naxwaha ah. Waxaa laga yaabaab in ay ka hadlayeen ujeedka caqiidada diineed ee ahayd ahaanshaha Ciise Iftiinka dunida, waa in aan ka turjunaa isla Iftiinkaas Maanlinteenan (cf. Matayos 5:14).

▣ **“habeen baa imanaya”** marka la barbar dhigo aayada 5 waxay tilmaaysaa in tani si cad u tahay hadal maldahan. Hebeeen waxa uu u taagnaan karaa

1. Xukunka iman doona
2. Xili fursada la xidhi doono
3. Diidmada iyo isku tallaab ku qodbida Ciise

9:5 “intaan dunida joogo” tani waxay u eegtahay oo ay noqon kartaa xiliga Jidh qaadashada, xiliga Bayta laxam ilaa Kaalfari/ Buur Saytuun Ciise halkan waxa uu joogay xili cayiman oo kaliya. Dhagaystayaasha wacdigiisu waa in ay hadda ka jawaabaan fariintiisa. Odhaahdani waxay is barbardhig caqiido diineed u tahay aayada 4

Arrin yaableh ayaa waxay tahay intee in leeg ayay “aniga” macne ahaan ku sarbeeban tahay qoraal sidani oo kale ah!

▣ **“waxaan ahay nuurkii dunida.”** Yooxaan badiyaba waxaa uu adeegsadaa “nuur” iyo “gudcur” si uu u masaalo run ahaansha ruuxiga ah. Ciise oo ah “nuurka dunida” (cf. 1: 4-5, 8-9;3:17-21;8:12;9:5;12:46) oo si maldahan uga turjumaysa Masiix ahaanshahii Axdiga Hore (cf. Ishacyaah 42: 6;49:6;51:4;60:1, 3). Ka eeg qoraal 8:12

9:6 “candhuuftii dhoobo ka sameeyey,” candhuuftu waxay ahayd dawo guriyeed ay dadka Yahuudu adeegsan jireen. Lama ogolayn in la adeegsado maalmaha sabbtida ah. (cf. aayada 14). Injiilladu waxaa ku diiwaan gashan seddex jeer oo Ciise candhuuf adeegsaday. (cf. Markos 7:33; 8:23; iyo halka kan). Isagoo tan adeegsaday, aqbalayna, oo xataa filaayay in ay tahay hab wax bogsiineed, Ciise waxa uu Jidh ahaan ku dhiirigalinaayay rumaysadka ninkan, islamrkasina si ula kac u tirtirsiyay dhaqamadii iyo sharciyadii Faarisiyiinta.

9:7 “balliga Siloo'am” Siloo'am macnaahiisu waa “ kan la diray” balligan waxaa loo isticimaali jiray caaddo diineedii Iidda Waababka.

▣ **“(oo fasirkiisii yahay, Waa la diray)”** ereyga “diray” waxay la xidhiidhaa xaqiiqada ah in biyahan balligu ay ka soo burqadeen il-biyooda Gixoon, oo ahayd duleed darbiyada magaalada Yerusaaleem. Wadaaddadii sare ee diintu waxay la xidhiidhiyeen ereyga “diray” hadal si maldahan u shegaysa Masiixeed. Tanina waa faalo tafatireed oo ka timi qoraaga.

▣ **“maydhay”** tani waxay ahayd ficilkiisii rumaysadka. Waxaa uu ku dhaqmay Ciise hadaladiisii! Haddana tani maa aha wali, “ rumaysadkii lagu badbaadayay” (cf. aayaadka. 11, 17, 36, 38). Waxay ahayd rumaysad hanaan geedi socod maraya. Gabi ahaan Injiillad, Yooxaana ayaa muujiya “heerar” rumaysad. Cutubka 8 waxaa uu tusinyaa koox “rumaystay” laakiin aan badbaadin (cf. Matayos 4; markos 13; masaalkii camuuda).

MAWDUUC GAAR AH: ERAYGA GIRIIGA AH FALKA JUMLADA LOO ADEEGSADAY BADBAADADA

Badbaadadu maaha wax soosaar, balse waa xidhiidh. Kuma dhammaan marka mid aammino Ciise, way ka billaabantaa uun! Ma ah sidii siyaasad caymiska dabka oo kale ah, ama tigidh jannada too s loogu tago, balse in lagu koro nolol ekaanshaha Ciise. Waxaa jirta maahmaah Maraykanka oo tidhaahda, inta badan ee lamaane wada noolaadaan, waxay keentaa in ay isu sii eegaadaan. Waa tani haddaba qasdiga badbaadadu!

BADBAADADA OO AH FICIL KAAMIL AH (AORIST)

- -Faliimaha Rasuullada 15:11
- -Rooma 8:24
- II Timotiyas 1:9
- Tiitas 3:5
- Rooma 13:11 (ayaa waxay u keenta AORIST wacyi galin mastaqbalka ah)

BADBAADADA WAA XAALAD AHAANSHO (dhawaan kaamilmay)

Efasos 2: 5,8

BADBAADADA WAA HANAAN GEEDI SOCOD SOCDA (WAKHTI XAADIR)

I Korintiyas 1: 18; 15:2
II Korintiyas 2:15
I Butrus 3:21

BADBAADAD WAA ISTICIMAAL AAYAHA DANBE (JUMLAD FAL MUSTAQBAL AH)

- Rooma 5:9,10; 10:9,13
- I Korintiyas 3:15; 5:5

- Filiboy 1:28;
- I Tesalonika 5:8-9
- Cibraaniyad 1:14,9:28
- I Butrus 1:5,9

Sidaasi darteed badbaadadu waxay la bilaabantaa, goaan qaadasho rumaysad, (cf. Yooxaana 1:12,3:16; Rooma 10:9-13), laakiin tani waa in ay ahaataa qodob hab nololeed hannaan geedi socod ah (cf. Rooma 8:29; Galaatiya 3:19; Efasos. 1:4; 2:10), taasi oo maalin ahaan doonta faham laga la isticimaalo. (cf. Yooxaana 3:2). Xaaladan kama danbaysta ah waxaa la yidhaa ammaanida. Tani waxa loo qeexi karaa sidan

1. Ammanid bilow ah- daahirinta (ka soo badbaadintii ciqaabtii dilka)
2. Badbaado socota-quduus ka dhid (ka soo badbaadintii xoogga danbiga)
3. Badbaadada kama danbavsta ah-ammaanida (ka soo badbaadinta iogitaankii danbiga).

9:8 “derisyadii” cutubkan waxa lagu sheegay seddex kooxood oo markhaati fur u ah mucjisan (1) darisyadiisii (aayada 8) ninka laftiisii (aayada 11); iyo (3) waalidkiis (aayada 18). Waxaa jira halkan khilaaf ku saabsan bogsiintii oo ka dhex oogan darisyadii , Faarisiyiintuna ka mid ahayeen.

▣ **“Kanu miyaanu ahayn kii fadhiyi jiray oo dawarsan jiray”** suaasha Giriiga ah waxaa la filan karaa “haa” jawaab.

9:9 “Isagii baan ahay” waxay la mid tahay sarbeebtii Giriiga ahayd ee Ciise adeegsaday ayadaha 4:26; 6:20; 8:24.28, 58; 13:19; 18:5, 6, 8. Macnaha guud waxaa uu sheegayaa in qaabkani aanu si toos oo iskiis ah xidhiidh ula lahayn muqaal rabbaani ah. Sidoo kale waxa jira waxyaale badan oo aan aad loo hubin marka ay timaado adeegsigi erayga *kurios* ee ayaadaha 36 (Mudane) iyo 38 (Sayid)

▣ **9:11-12** sida aan kafahmi karo wada sheekaysigan bogsiinta ninkani kuma lug laha wax badbaado ruuxi ah. Rumaysadka ninkani waxaa uu ku koray kulankii uu la qaatay Ciise (cf. ayaada 35).

NASB (UPDATED) TEXT: 9:13-17

¹³Markaasaa kii markii hore indhaha la'aa waxaa loo geeyey Farrisiintii. ¹⁴Waxayna ahayd sabti maalintii Ciise dhoobada sameeyey oo indhihiisii furay. ¹⁵Mar kale haddaba Farrisiintii waxay weydiiyeen siduu araggiisa ku helay. Markaasuu wuxuu ku yidhi, Dhoobuu indhahayga mariyey, oo aan maydhay, oo wax baan arkayaa. ¹⁶Sidaa aawadeed Farrisiinta qaarkood waxay yidhaahdeen, Ninkan xaggii Ilaah kama iman, waayo, sabtida ma dhawro. Qaar kalese waxay yidhaahdeen, Sidee baa nin dembi leh calaamooyinkan oo kale u samayn karaa? Markaasay kala qaybsameen dhexdoodii. ¹⁷Waxay haddaba ninkii indhaha la'aa ku yidhaahdeen, Maxaad ka leedahay isaga, waayo, waa kan indhahaaga furay e? Wuxuu ku yidhi, Waa nebi.

9:13 “Iyaga ” tani dabcan waxay ka hadlaysaa darisyadii.

▣ **“Faarisiyiintii”** hoggaamiyeyaashii diinta ee Yahuudu waxay Yooxaana ugu dhigan yiin laba ha boo kal duwan. Waxaa badiyaaba loo yaqaanaa sidii “Yuhuud” (aayadaha 18, 22). Siday doontaba ha ahaatee, cutubkan waxaa loogu yeedhay Faarisiyiin aayadaha 13, 15, 16 iyo 40. Ka eeg mawduuc gaara 1:24

9:14 “Waxayna ahayd sabti maalintii Ciise dhoobada sameeyey” hoggaamiyeyaasha Yahuuda, xeer dhaqameedkii, (axaadiistii kabayay Talmuudka) waxay tusaale u soo qaateen baahida qofkan (cf. 5:9; 9:16, Matayos 23:24). Waxay aad ugu dhawday in Ciise si badheedh ah sameeyay maalinta Sabtida isagoo uga dan lahaa inuu ka dhex abuurro wada hadal caqiido diineed hoggaamiye yaashan. Ka eeg qoraal 5:9.

9:16 waxaa laga yaabaa in ay Faarisiyiintu xukunkooda ka dhanka ha Ciise ay ku salaynayeen Sharciga ku noqoshadiisii 13: 1-5.

▣ **“way ku kala qaybsameen”** Ciise ayaa taani markasta sababayay (cf. 6:52; 7:43; 10:19; Matayos 10: 34-39).

9:17 “ isagu waa Nebi” cutubkani waxa uu ina tusayaa koritaanka rumaysadka ninkii (cf. aayadaha 36, 38). Ka eeg “Nebi” mawduuc gaar ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 9:18-23

¹⁸Sidaa aawadeed Yuhuuddu kama rumaysanin inuu indha la'aa, oo uu araggiisa helay, ilaa ay u yeedheen waalidkii kii araggiisa helay, ¹⁹oo weydiyeen, iyagoo leh, Kanu ma wiilkiinnii baa aad leedihiin, Wuxuu ku dhashay indhala'aan? Sidee buu hadda wax ku arkaa? ²⁰Waalidkiis waxay haddaba ugu jawaabeen, Waannu garanaynaa kani inuu wiilkayagii yahay oo uu indhala'aan ku dhashay? ²¹laakiin siduu hadda wax ku arko garan mayno, kii indhihiisii furayna garan mayno. Isaga weydiya. Waa nin weyn. Waa isu hadli doonaaye. ²²Waxyaalahaas waxay waalidkiis u yidhaahdeen, waayo, Yuhuudday ka baqeen. Maxaa yeelay, Yuhuuddu waxay mar hore ku heshiyeen in qof uun hadduu u qirto inuu yahay Masiixa, sunagogga laga saaro. ²³Sidaa aawadeed waalidkiis waxay ku yidhaahdeen, Waa nin weyn ee weydiya isaga.

9:22-23 “qof uun hadduu u qirto inuu yahay Masiixa” Kani waa JUMLAD SHURUUDEED HEERKA SEDDEXAAD AH taasi oo macnaheedu yahay fal muxtasil ah ama suurto galnimadiisu aadu sarayso.

Waalidkii ninku waxay ka cabsadeen hoggaamiyeyaashii Yuhuuda. Waxa jira dhawr maarkaatiyaal ah oo caddaynaya bogsiintan (1) darisyadii (aayadaha 8-10); (2) ninka laftiisii (aayadaha 11-17; 24-33); iyo (3) waalidkiis (aayadaha 18-23).

MAWDUUC GAAR AH: QIRASHO

- A. Waxa jira laba qaab oo la mid ah asalkii Giriiga oo loo adeegsaday qirasho , *homolegeo iyo exomologe*. Ereyga qaabka isku dhiska ee Yooxaana u adeegsaday *homo*, waxay la mid tahay *legio*, hadlid; iyo *hore*, bannaanka ka ah. Macnaha aasaasiga ahi ee ay sheegayaan waa wax isku mid ah, isku raacid, hore oo lagu daray bayaankii dadwaynaha.
- B. Turjunka Ingriisiga ee ereygan koox waa
 - 1. Ammaan
 - 2. Isku waafaqid
 - 3. Bayaamin
 - 4. Qirasho
 - 5. Danbi qirasho
- C. Eray kooxeedkani waxay leeyiin laba hab adeegsi u muuqda in ay iska soo horjeedaan
 - 1. In Ilaah la ammaano
 - 2. In danbi la qirto
Tani waxaa laga yaabaa in ay ku kortay fahanka binuaadanka ee macnaha qudduusnimada Ilaah iyo dambiilenimadooda. In la qiro midood run waxay qiraysaa labadoodaba.
- D. Axdiga Cusub Adeegsiga eray kooxeedkani waa
 - 1. la ballanqaaday (Matayos 14:7; Faliimaha Rasuullada 7:17)
 - 2. Isku waa faqid ama isku raacid arrin (cf. Yooxaana 1:20; Lukos 22:6; Faliimaha Rasuullada 24:14; Cibraaniyada 11:13)
 - 3. In la ammaano (cf, Matayos 11:25; Lukos 10:21; Rooma 14:11; 15:9)
 - 4. Ku raacid
 - a. Qof (cf. Matayos 10:32; Lukos 12:8; Yooxaana 9:22; 12:42; Rooma 10:9; Filiboy 2:11; I Yooxaana 2:23; Muujintii 3:5)
 - b. Run (cf. Faliimaha Rasuullada 23:8 II Korintiyas 11:13; I Yooxaana 4:2)
 - 5. Samaynta bayaan dad wayne oo (dareen sharci ahaan ku koray ansaxin diimeed, cf. Faliimaha Rasuullada 24:14, I Timotiyas 6:13)
 - a. Danbi qirasho laan (I Timotiyas 6:12; Cibraaniyada 10:23)
 - b. Tiyoo danbi la qirtay (cf. Matayos 3:6; Faliimaha Rasuullada 19:18; Cibraaniyada 4:14; Yacquub 5:16; I Yooxaan 1:9)

9:22 “ qof uun hadduu u qirto inuu yahay Masiixa, sunagogga laga saaro” sida muuqata, waalidku waxay ka cabsadeen in la takooro ama la gooyo (12:42; 16: 2). Habkani waxaa laga yaaba in uu dib ugu laabto Cesraa (10:8). Qoraalada wadaada diinta markaan eegno waxaan ogaanayanaa in ay jireen seddex nooc oo takoorid ah (1) mudo hal todobaad ah (2) hal bil (3)daayin noloshiisa oo dhan. Yooxaana waxa uu tan u qorayay sannadaha qarniga sii dhamaanaya , isaga ogsoonaa Sunagoog ka saarista, sababta u qirashada Ciise in uu yahay Masiixa awgeed. Waxyaalahan taariikhiga ah oo “qaab habaar ah” ayaa y sii hor mariyay Faarisiyinta wixii ka danbeeyay 70 C.D. **isku soo ururintii Yahuudii Jamnia .**

☐ “waxay ahayd in laga saaro Sunagoga” habkani waxaa uu ahaa qaab taxane ah oo ruuxa la dayriyo.

NASB (UPDATED) TEXT: 9:24-34

²⁴Haddaba mar labaad ayay ninkii indhaha la'aa u yeedheen oo ku yidhaahdeen, Ilaah ammaan. Waxaannu garanaynaa inuu ninkanu dembi leeyahay e. ²⁵Wuxuu haddaba ugu jawaabay, Inuu dembi leeyahay garan maayo, waxa keli aho aanse garanayaa, inaan indha la'aa, oo aan haddana wax arkayo. ²⁶Waxay haddaba ku yidhaahdeen, Muxuu kugu sameeyey? Sidee buu indhahaaga u furay? ²⁷Wuxuu ugu jawaabay, Horaan idiinku sheegay, mana aydnaan maqlin. Maxaad u doonaysaan inaad mar kale maqashaan? Idinkuna ma waxaad doonaysaan inaad xertiisa noqotaan? ²⁸Markaasay caayeen oo waxay ku yidhaahdeen, Adigu xertiisa baad tahay, annaguse waxaannu nahay xertii Muuse. ²⁹Waxaannu garanaynaa inuu Ilaah la hadlay Muuse, laakiinse ninkanu meeshuu ka yimid garan mayno. ³⁰Ninkii baa u jawaabay oo ku yidhi, Waxakanu waa yaab inaydnaan garanaynin meeshuu ka yimid, isaguna uu indhaha ii furay. ³¹Waannu garanaynaa inaan Ilaah dembiilayaashii maqlayn, laakiin wuxuu maqlaa kii Ilaah caabuda oo doonistiisa sameeya. ³²Tan iyo dunida bilowgeedii lama maqlin nin indhaha u furay qof indhala'aan ku dhashay. ³³Ninkanu haddaanu xaggii Ilaah ka iman, waxba ma UU samayn kareen. ³⁴Markaasay u jawaabeen oo ku yidhaahdeen, Dhammaantaaba dembiyo waad ku dhalatay ee ma wax baad na baraysaa? Kolkaasay dibadda ku tuureen .

9:24“Ilaah ammaan.” Tani waxay ahayd mid qaab dhaar- marid ah si loo hubiyo runahaanshaha (Yeshuuca 7:19)

9:25 jawaabtani waxay tahay mid ku saabsan ayaada 16. Ninku ma rabbin in dhexgalo muran diimeed, balse wuun buu carrabka ku adkeeyay natiijada ka soo baxday la kulankiisii Ciise.

9:27 “Idinkuna ma waxaad doonaysaan inaad xertiisa noqotaan” marka la eego naxwaha qaabka Giriiga waxaa filashadu tahay (maya) Jawaab, laakiin waydiinta isla suaashan waxay ahayd mid daran xeel-dheer oo muujinaysa garashada sare ee Indhoolkan tuugsadaha ah.

9:28a “Adigu xertiisa baad tahay” curubkan waxay suaasha runta ahi tahay waxa uu ninku u noqday rumayste. Waxay u eegtay in aan bilowgii hore bosiintii Ciise ninkan bogsiiyay aanay ku xidhiidhsanayn rumaysadkiisii uu u rumaystay isaga in Yahay Masiixa; gadaal uun buu Ciise ugu sheegay dacwadiisii Masiixnimo (aayadaha 36-38) dhacdadani waa mid muujinaysa in aan bogsiinta xagga jidhku aanay muhiimad ahaan keenin Badbaadada.

9:28b-29 midani waxa kale oo muujinaysaa adayga ay hoggaamiyeyaasha diintu wajahayaan. Waxay isku dayeen in ay ku xidhiidhiyaan fahfaahin, fasiro gaar ah oo ku dhigan (Talmud) ee waxygii loo muujiyay Muuse. Indhahooda waxa daboolay ama indho tiray iskaga dhegsanaanta aanay fahmin ee diintooda. (Matayos 6:23) waxaa xer lagaga dhigay dhaqamo binu aadan. (Ishacyah 29:13)

9:29 “meeshuu ka yimid garan mayno. Tanina waa tusaale kale oo ina tusaya xeel-dheerida Yooxaana (7:27-28; 8:14). Ciise Aabbaha ayuu ka yimid (8:42; 15:3; 16:28), balse indhola'aantooda darteed xertu may garanayn

1. Asalkiisa
2. Goobta dhalashadiisa

9:30 “Ninkii baa u jawaabay oo ku yidhi, Waxakanu waa yaab inaydnaan garanaynin meeshuu ka yimid, isaguna uu indhaha ii furay” midanina waa tusaale kale oo muujnaya, garaadka iyo xeeldheerinimada tuuksadahan indhoolka ahi, waxba kama jiraan kaga dhigay macquulnimadii Faarisiyinta.

9:31-33 ninkan indhoolka ah ee aan lahayn wax wax barasho ah ayaa kaga wanaagsanaa faanka diintaa wadaaddai sare ee diinta!

9:33 “**haddii**” tani naxeahaan waa JUMLAD SHUREED HEERKA LABAAD AH oo loo yaqaano “ cakiska xaqiiqda” loo fahmi karayay “ haddii aan ninkani aanu Ilaah ka iman, kaasi oo ka yimi, dee markaasi ma samayn kareen wax yaale sidan oo kale ah, laakiin wuu sameeyay.

9:34 “**Dhammaantaaba dembiyo waad ku dhalatay**” waa arrin xiise leh haddaba inaanay wadaaddad sare ee Yuhuudu aanay fahansanay wax fikir ahna aanay ka haysan “asalka danbiga” (Yacquub 14:1, 4: Sabuurada 51:5) dhicitaankii danbiga lagu dhacay sida ku qoran Bilowgii 3 muhiimad lama siin caqiidadii Yuhuuda. Waxay Yuhuudu carrabka ku adkeenayeen in ay ku jirto qasdi wanaag iyo xumaani (*yetzer*) qof kasta. Faarisiiyintani waxay ku adkaysanayeen in ninkan la bogsiiyay markhaatifurkiisa iyo hadalkiisa caqligalka ahiba aanay ansax ahayn sababtoo ah waxa uu si cad ugu dhashay danbi, ay markhaati u tahay indho la, aanta uu ku dhashay.

▣ “ **dibadday ku tuureen .**” macne ahaan waxay tani tahay “ dibada ayay eryeen” tixraacuna waa (1) xubinnimadii iyo ka qayb qaadashadii sunagogyada deegaankaas. Ama (2)ka eryid kulanka. Macnaha #2 ayaa u muuqda ka ugu habboon.

NASB (UPDATED) TEXT: 9:35-41

³⁵Ciise ayaa maqlay inay dibadda ku tuureen, wuuna helay oo ku yidhi. Wiilka Ilaah ma rumaysan tahay? ³⁶Markaasuu u jawaabay oo ku yidhi, Yuu yahay, Sayidow, aan rumaystee? ³⁷Ciise ayaa ku yidhi, Waad aragtay, waana isaga kan kula hadlayaa. ³⁸Markaasuu ku yidhi, Waa rumaysnahay, Sayidow. Wuuna caabuday. ³⁹Ciise wuxuu yidhi, Waxaan dunidan u imid xukun, kuwa aan wax arkin inay wax arkaan, kuwa wax arkaana inay indho beelaan. ⁴⁰Kuwii Farrisiinta ahaa oo la joogay ayaa waxyaalahaas maqlay, oo waxay ku yidhaahdeen, Annaguna ma indha la nahay? ⁴¹Ciise ayaa ku yidhi, Haddaad indhala'aan lahaydeen, dembi ma aydin lahaateen, laakiinse haatan waxaad tidhaahdaan, Wax baannu aragnaa. Dembigiinnu waa sii jiraa.

9:35

NASB, NRSV,

TEV, NJB

“ma rumaysantahay Wiilka Aadanaha?”

NKJV

“ma rumaysantahay Wiilka Ilaah?”

Qoraalada qadiimka ah ee Giriigu A iyo L waxay leeyiin “Wiilka Ilaah” laakiin, pp ⁶⁶p⁷⁵, x, B, D, waxay leeyiin “Wiilka Ilaah” habka isticimaalka Yooxaana iyo caddaymaha qoraaladu “ Wiilka Ilaah” ayaa aad uga habboon, xaqiiq ahaana runta u dhaw. UBS⁴ waxa uu leeyay “Wiil” “A” darajo (hubaal ah). Naxwe ahaan suaashani waxaa la filan karaa “ haa” Jawaab.

9:36

NASB, NKJV

“Sayid”

NRSV, TEV

“Mudane”

NJB

Waxaanka rki karaa cutubkan koritaanka rumaysadka ninkii, isagaa oo ka bilaabay yeedhitaankii Ciise u yeedhay.

1. Nin (aayada 11)
2. Nebi (aayada 17)
3. Horgale magac sharafeedka “Mudane” (aayada 36)
4. “Sayid” macnaha buuxa ee adeegsiga weedha hab waxbaritan diimeed (aayada 38)

Ereyaga Giriiga ahi waxaa uu la mid yahay labadaba aayadaha 36 iyo 38. Macnaha guud ayuunbaa goamin kara muqaalka dhabta ah. Ka eeg mawduuc gaara: magacyada Rabbaaniga ah 6:20. Ereyga Giriiga ah *kurios*

waxa uu macne ahaan noqon karaa erayga Cibraaniga ah ee *adon* oo hadal afeed ahaan badalkeedii noqonaya YHWH.

9:38 tani waa biyo dhaca qoraalkan, tani iyo inta badbaadada ninkan la bogsiiyay meesha taalo. Waxaa la yaab leh in aayadan laga waayo qaar ka mid qoraalada qadiimka ah ee afka Giriiga (p⁷⁵, x W) iyo Diatessaronka (isu keenistii hore ee afarta Injiil). Waxay koobsataa laba weedhood oo nadir ah: (1) odhaahda “ wuxuu ku yidhi” waxaa dhacday halkan oo kaliya iyo 1:23 iyo weedha “wuu caabuday” waxay dhacdaa halkan Yooxaana kaliya. Waa mid kujirta ama laga helo badi turjumaadaha casriga ah.

9:39 “Waxaan dunidan u imid xukun” waxaa laga yaabaa in ay tani la xidhiidhsantahay 5:22, 27 taasi oo ka hadlaysa xukunka dhamaadka wakhtiga (eschatological) siday doonta ha ahaatee, waxaa dhici kartaa in tani ay ka hor imaanayso 3: 17-21 iyo 12:47, 48. Tani waxaa la waafajin karaa xaqiiqda ah in Ciise u yimi qorshaha Cafiska, balse ay binu aadmigu diideen deeqdiisii, oo ay si toosa iyagu xukun isugi rideen.

▣ **“kuwa aan wax arkin inay wax arkaan, kuwa wax arkaana inay indho beelaan.”** Tani waa wax sii sheegis laba buusamid leh gaar ahaana marka la eego Ishacyah.

1. Israa’iiliyiintii qabka waynaa ma fahmi doonaa fariinta Ilaah (Ishacyaha 6:10, 42: 18-19; 43:8; Yeramiya 5 :21 Yexisqel 12:2)
2. Masaakiintii, la takooray, ee jidhka ka curyaansanaa ee toobakeenta la yimid isna hoosaysiiyay ayaa fahmi doona (Ishacyah 29:18; 32:3-4; 35:5; 42:7, 16)

Ciise waa ruurka dunida ee dhammaan kuwa doorta inay arkaan eeg (Faliimaha Rasuullada 1:4-5, 8-9).

9:40 “Annaguna ma indha la nahay” naxawaha jumlada Giriiga ah ee waxay la filankaraa ina jawaabtu noqoto (Maya) Matayos 15:14; 23:24) aayadaha ugu danbeeya ee cutubkani waxay muujinyaan masaal ficil ahaan loogu sameeyay indhalaanta xagga ruuxa, oo ah mid aan la bogsiiin karin (danbiga rumaysad laaanta aan la cafin karin eeg mawduuc gaara 5:21), iyo indholaanta xagga jidhka, oo ah mid la bogsiiin karo!

9:41 aayadani waxay qeexaysa runta guud ahaan (Rooma 3:20; 4:15; 5:13; 7:7, 9). Binu aadanka ayaa masuuliyada Nuurka la siiyay, iyaga ayaa leh ama shaaca looga qaaday!

SU’AALO FALANQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeen kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Cutubkani aasaas ahaan ma waxa uu la tacaalayaa bogsiiinta xagga jidhka mise ta ruuxiga ah? Indho laanta Jidhka mise Mida ruuxuuga ah?
2. Sidee ninkani danb u lahaanayay ka hor intii aanu dhalanba?
3. Cutubkan marka la eego heerkee ayuu ninkani ku helay badbaadada?
4. Ciise ma waxa uu dunida u yimi inuu xukumo mise in uu badbaadiyo?
5. Sharraxaad ka bixi macnaha uu xambaarsantahay weedha “Wiilka Aadanaha”
6. Tax qodobada aadka u xeesha dheer ee ninka indhoolka ahi u adeegsaday jawaabtii uu siiyay hoggaamiyeyaashii Yuhuuda?

YOOXANAA 10

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Masaal ku saabsan Xerada Idaha	Ciise Adhijidhka Runta ah	Ciise, Adhijidhkii Naftiisa Bixiya	Masaal ku saabsan Adhijidhka	Adhijidhka Wanaagsan
10:1-6	10:16	10:1-6	10:1-5 10:6	10:1-5 10:6
Ciise Adhijidhka Wanaagsan	Ciise Adhijidhka Wanaagsan		Ciise Adhijidhka Wanaagsan	
10:7-18	10:7-21	10:7-10 10:11-18	10:7-10 10:11-16 10:17-18	10:7-18
10:19-21		10:19-21	10:19-20 10:21	10:19-21
Ciise oo ay Yuhuuddii Diiday	Adhijidhku Waa Yaqaan Idihiisa		Ciise oo La Diiday	Ciise oo ku Doodaya in uu yahay wiilka Ilaah
10:22-30	10:22-30	10:22-30	10:22-24 10:25-30	10:22-30
10:31-39	10:31-39	10:31-39	10:31-32 10:33 10:34-38 10:39	10:31-39 10:39
	Rumaystayaashii Urdun ka fogaa			Ciise oo u Kacay Dhanka Kale ee Urdun
10:40-42	10:40-42	10:40-42	10:40-42	10:40-42

AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga v)g *ADIGA OO RAACAYA UJEDKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA*

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafsiiri lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiirka. Waa in aadan middan ula tegin qof kuu tafsiira..

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

1. Baaragaraaf-ka koowaad

2. Baaragaraaf-ka labaad
3. Baaragaraaf-ka saddeexaad
4. IWM.

FAHANKA MACNAHA GUUD

NASB (UPDATED) TEXT: 10:1-6

¹Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii aan xerada idaha illinka ka soo gelin ee meel kale ka soo fuulaa, kaasi waa tuug iyo waxdhace. ²Laakiin kii illinka ka soo galaa waa adhijirka idaha. ³Illinjoogaha ayaa isaga illinka ka fura, iduhuna codkiisay maqlaan, idihiisana magacyadooda ayuu ugu yeedhaa, oo dibadduu u kaxeeyaa. ⁴Markuu kuwiisa wada saaro, wuu hor kacaa, iduhuna way raacaan, waayo, codkiisay garanayaan. ⁵Nin qalaadna raaci maayaan, laakiin way ka cararayaan, waayo, codka kuwa qalaad garan maayaan. ⁶Masaalkaas Ciise ayaa kula hadlay iyaga, laakiin ma ay garan waxyaaluhuu kala hadlayay xagooda

10: 1 “Runtii, runtii,” Ka eeg tusmo-qoraalka 1:46

▣ “meel kale ka soo fuulaa, kaasi waa tuug iyo waxdhace.” Ogsoonow in ay jiraan kuwo xerada adhiga ku dhex jira oo aanu adhijirku lahayn (cf. 7:21-23 iyo “masaalka ku saabsan sarreenka iyo gocandhada” Matayos 12:24-30). Dhibaataadu waxa ay tahay in qaar isku dayaan in ay ku yimaadaan iyagoo camalladooda u kaashanaya wixii Ilaah sida xorta ah ugu bixiyey Ciise Masiix (cf. 3:14-16). Faarisiintii Cutubka 9-aad ku jirta ayaa ah tusaale wanaagsan.

10:2 “Laakiin kii illinka ka soo galaa waa adhijirka idaha.” Waxaa jira isku dhaf cad oo ku jira cutubkan dhexdiisa. Ciise oo ah illinka xerada adhiga, aayadda. 7, iyo sidoo kale adhijirka idaha (aayadaha. 11 iyo 14). Arrintu si kastaba ha ahaatee, tilmaamahan isku dhafan waa kuwo caan ku ah Yooxanaa dhexdiisa iyo sidoo kale Axdiga Cusub dhexdiisa.

1. Ciise waa kibista iyo bixiyaha kibista (cf. aayadda 6:35, 51)
2. Ciise waa runta iyo kan runta ka hadla (cf. aayadaha. 8:45-46 iyo 14:6)
3. Ciise waa dariiqa iyo tilmaamaha dariiqa (14:6)
4. Ciise waa allabariga iyo kan allabariga bixiya (cf. Kitaabka Cibraaniyada)

Magaca “Adhijir” waa mid caan ka dhex ah Axdigii Hore kaasoo lagu tilmaamayo Ilaah iyo Masiixa (cf. Sabuurrada 23; Sabuurrada 80:1; Ishacyaah 40:10-11; I Butros 5:1-4). Hoggaamiyeyaashii Yuhuudda waxaa loogu yeedhaa “adhijirrada beenta ah” sida ku jirta Yeremyaah 23; Yexesqeel 34 iyo Ishacyaah 56:9-12. Ereyga “adhijir” waxa uu la xidhiidhaa ereyga “wadaad” (cf. Efesos 4:11; Tiitos 1:5, 7).

10:3 “iduhuna codkiisay maqlaan” Aqoonsashada iyo adeecistu waxa ay aasaas u yihiin xidhiidhka. Sida ku jirta Yooxanaa “maqalka” (cf. 4:42. 5:24, 25, 28-29; 8:47; 10:16, 27; 18:37) iyo “aragti” (cf. 3:3; 12:40; 20:8) labadaba waxaa loo adeegsadaa in lagu rumeeyo ama lagu aammino in Ciise yahay Masiixa.

▣ “idihiisana magacyadooda ayuu ugu yeedhaa” Ciise wuu yaqaan shaqsi ahaantiisa iyo midka uu yahay (sida YHWH yahay, cf. 10:29-31). Adhijiradu aalaaba naynaas ayey u bixiyaan xoolahooda, xitaa haddii ay wax badan yihiin.

Marka xagga fiqiga laga eego waa wax la yaab leh in Ciise uu idihiisa runta ah uga yeedho idaha beenta ah ee quruunta Yuhuudda. Dadkii axdigu maysan ahayn dadka runta ah ee Ilaah. Tani waa fadeexadda xagjirka ah ee axdiga Cusub. Qofka rumaysadkiisa, ma aha faraca uu ka soo jeedo, waxa qofka mustaqbalkiisa! Rumaysadku waa shaqsi, ma aha qoomiyad.

Hoggaamiyeyaasha Yuhuudda ee Ciise ka soo hor jeestay kama aysan mid ahayn dadka Ilaah (cf. aayadda. 26)!

▣ **“oo dibadduu u kaxeeyaa”** Tani badbaadada oo qura lama xidhiidho, laakiin sidoo kale hagd maalin kasta ah (cf. aayadaha 4 & 9).

10:4 Tan waxaa laga yaabaa tixraac ku aaddan caadada ah in la ilaaliyo hormooyin waqtiga habeenka. Subaxnimada adhijirka ayaa u yeera idihiisa oo way u yimaaddaan.

10:5 had iyo goor kaniisaddu waa ay macaamili jirtay adhijirrada beenta ah (cf. I Timoteyos 4:1-3, II Timoteyos 4:3-4; I Yooxanaa 4:5-6; II Butros 2).

10:6 “Masaalkaas Ciise ayaa kula hadlay iyaga” Kani ma aha ereyga caadiga ah ee lagu tarjumay “parable” (*parabole*), laakiin isku sal ayey ku imanayaan oo ah (*paroiimian*). Habkan waxaa laga helayaa halkan iyo sidaku jirta 16:25, 29 iyo II Butros 2:22. Inkastoo uu yahay hab ka duwan, waxa ay u muuqataa in ay isku mid yihiin sida guud ahaaneed ereyga “masaal” (ee lagu adeegsaday Injiillada). Ereyga “masaal” waxa uu macnihiisu yahay aalaaba in uu galo booska arrin dhaqan ahaaneed oo waaqici ah oo au runta ruuxu la socoto, si ay caawimaad fahan u siiso. Waxa ay, si kasta ha ahaatee, waxa ay tilmaami kartaa qarinta runta ee indhaha ruuxa laga qarinyo (cf. 16:29; markos 4:11-12).

▣ **“laakiin ma ay garan”** Haddii cutubka 10-aad waqti ahaan uu la xidhiidho cutubka 9-aad, “iyaga” waxa ay tilmaamaysaa Faarisiinta. Waxa ay ku doodeen in ay arkaan (cf. 9:41), laakiin maysan arag (cf. 10:20). Diintu caqabad ayey noqon kartaa, ee ma aha buundo, ama sallaan.

NASB (UPDATED) TEXT: 10:7-10

⁷Haddaba Ciise ayaa mar kale ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Waxaan ahay illinka iduhu ka soo galaan. ⁸Kuwii hortay yimid oo dhammu waa tuugag iyo waxdhacayaal, iduhuse ma maqlin. ⁹Waxaan ahay illinka, haddii qof uun xaggayga ka soo galo, wuu badbaadi doonaa, wuuna soo geli doonaa oo bixi doonaa, daaq buuna heli doonaa. ¹⁰Tuuggu wax kale uma yimaado inuu wax xado oo dilo oo halleeyo mooyaane, aniguse waxaan u imid inay nolosha haystaan oo ay badnaan u haystaan.

10:7 “Waxaan ahay illinka iduhu ka soo galaan” Tani waa mid ka mid ah toddobada hadal ee Yooxanaa ee caanka ah. Tilmaantani waxa ay muujinaysaa runta ah in Ciise yahay jidka keliya ee runta ah (cf. 8, 10; 14:6). Tan waxaa aalaaba loogu yeedhaa fadeexadda ah in injiilka wax laga saaray. Haddii Baybalku uu yahay is muujinta Ilaah, dabadeed waxaa jira hal waddo oo qura oo Ilaah xaq lagula noqon karo—kaasoo ah rumaysadka Masiixa (cf. Falimaha Rasuullada 4:12; I Timoteyos 2:5). Eeg tasmada 8:12.

10:8 “Kuwii hortay yimid oo dhammu waa tuugag iyo waxdhacayaal” Marka la eego macnaha cutubyada 9 iyo 10, danaynta iidda Hanukkah (cf. 10:22), waxaa macquul ahin midani ay xidhiidho diidmooyinkii wadaaddadii diinta iyo farcankoodii intii lagu guda jiray waqtigii axdiga. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxa ay aad ula xidhiidhaa cutubyada Axdigii Hore eek u saabsan adhijirrada beenta ah (cf. Ishacyaah 59:9-12; Yeremyaah 23; Yexesqeel 34; iyo Sakariyaah 11).

Luuqaddan aadka u maldahan waxa ay faracii wadaaddadii hore ku kalliftay in ay dib hagaajiyaan ama u ballaadhiyaan qoraalkan iyagoo isku dayaya in au macnihiisa sharraxaad ka bixiyaan. Hal qorniin (MS D) waxa uu si fudud uga saaray ereyga ku jira ee ah “dhammaan ama dhammu” dhowr qorniinnadii hore ahna (P⁴⁵, P⁷⁵, S*) waxa ay ka saareen weedha ah “aniga hortayda.”

10:9 “haddii qof uun xaggayga ka soo galo, wuu badbaadi doonaa” Tani waa jumlad heerka saddexaad ah oo xaalad tilmaamaysa oo uu la socdo fal aan toosnayn oo mustaqbalka ah. Ciise waa jidka keliya ee Ilaah loogu tago (cf. 14:6). Ereyga ah “badbaadi” sida macnahan guud uu yahay waxa uu la xidhiidhaa tilmaantii Axdigii Hore ee imaanshada jidh ahaaneed (tusaale ahaan, iduhu waa ay badbaado qabaan). Arrintu si kastaba ha ahaatee, Yooxanaa waxa uu had iyo goor dooranayaa ereyda yeelan kara labo macne iyo wixii lasii dheer. Ujeedka badbaadada ruux ahaaneed ma aha in sidoo kale la waayo macnahan guud (cf. 42).

10:10 “Tuuggu” Tani waxa ay muujinaysaa ujeeddooyinka ugu sarreeya ee adhijirrada beenta ah. Waxa ay sidoo kale ka jawaabaysaala’ ujeedka kan sharka leh! Qaab fikirka daryeel la’aanta shaqaalaha la kiraystay waxaa laga dhex arki karaa aayadaha. 12-13.

▣ **“hallayn”** ee Mawduuca Gaarka ah ee soo socda.

MAWDUUC GAAR AH: BURBUR (APOLLUMI)

Ereygani waxa uu leeyahay xaddi balaadhan oo semantic ah, kaasoo dhaliyey jahwareer weyn oo ah xidhiidhka aragtiyada fiqi ahaaneed ee xukunka weligiis ah oo uu ka soo hor jeedo halligaadda. Macnaha erey ahaan waxa uu ka yimid *opa* lagu daray *ollumi*, in la qarribo, in la burburiyo.

Dhibaataadu waxa ay ka timid ereygan adeegsiyadiisa maldahan. Tan waxaa si cad looga arki karaa Louw iyo Nida *The Greek-English Lexicon of the New Testament, Based on semantic Domains*, qaynta 2. Bogga 30. Waxa uu tax u samaynayaa dhowr macne oo uu ereygan leeyahay

1. Burburin (tusaale ahaan, Matayos 10:28; Luukos 5:37; Yooxanaa 10:10; 17:12; Falimaha Rasuullada 5:37; Rooma 9:22 oo ka yimid qaybta 1, bogga 232)
2. Lagu guul darraysto in la helo (tusaale ahaan, Matayos 10:42, qaybta 1, bogga 566)
3. Lumin (tusaale ahaan, Luukos 15:8; qaybta 1, bogga 566)
4. Boos aan la aqoon (tusaale ahaan, Luukos 15:4, qaybta 1, bogga 330)
5. Dhimasho (tusaale ahaan, Matayos 10:39, qaybta 1, bogga 266)

Gerhard Kittel, *Theological Dictionary of the New Testament*, qaybta 1, bogga 394, waxa uu isku dayayaa in uu isku dayayaa in sharraxo isagoo afar macne u taxaya sidan:

1. In la burburiyo ama la dilo (tusaale ahaan, Matayos 2:13; 27:20; Markos 3:6; 9:22; Luukos 6:9; I Korintos 1:19)
2. In la lumiyo ama lala silco qasaare ka yimid (tusaale ahaan, Markos 9:41; Luukos 15:4,8)
3. In la halligo (tusaale ahaan, Matayos 26:52; Markos 4:38; Luukos 11:51; 13:3,5,33; 15:17; Yooxanaa 6:12,27; I Korintos 10:9-10)
4. In la dhimo (tusaale ahaan, Matayos 5:29-30; Markos 2:22; Luukos 15:4,6,24,32; 21:18; Falimaha Rasuullada 27:34)

Kittel dabadeed waxa uu odhanayaa, “sida guud ahaaneed waxaa odhan karnaa in #2 iyo #4 ay sababyaan hadalka la xidhiidha adduunkan sida injiillada ku jirta, halka #1 iyo #3 sababayaan kuwaa la xidhiidha addunka labaad, sida ku jirta Bawlos iyo Yooxanaa” (bogga 394).

Halkan waxaa yaal wareerkii. Ereygu waxa uu leeyahay adeegsi ballaadhan oo luuqadda semantic-ga ah oo ay qoraayaalsha Axdiga Cusub ay u adeegsadeen habab kala duwan. Waxaa jecelahay Robert B. Girdstone, buuggiisa, *Synonyms of the Old Testament*, bogagga 275-277. Waxa uu ereyga la xidhiidhinayaa dadkaa niyad ahaan u burburay ee sugaya kala go’ weligiis ah oo Ilaah uga yimaadda oo ay ka soo hor jeedo aadanaha yaqaan Masiixa ee nolosha weligeed ah la leh Isaga. Kooxda dambe waa la “badbaadiyey,” halka kooxda hore ay ka halligmayaan.

Aniga shaqsi ahaan, uma malaynayo in ereygan uu muujinayo halligaad (cf. E. Fudge, *The Fire that Consumes*). Ereyga ah “weligii ama abid” waxaa loo isticmaalaa labadaba ciqaabta weligeed ah iyo nolosha weligeed ah sida ku jirta Matayos 25:46. Haddii mid la door hoosaysiiyo waa iyadoo labadaba la door hoosaysiiyey!

▣ **“aniguse waxaan u imid inay nolosha haystaan oo ay badnaan u haystaan”** weedhan waxaa loo xigtaa aalaaba sida ballanta waxyaabaha muuqada, laakiin macne ahaan waxa ay la xidhiidhaa Ciise shaqsi ahaan iyo barakooyinka ruuxiga ah, ma aha barwaaqo xagga maalka ah, oo uu Isagu keenayo (waxa ay isla siman yihiin 4:14 iyo 7:38). Ma wax badan oo noloshan dhexdeeda lagu helo, laakiin ogaansho iyo lahaansho nolol run ah!

Sida ku jirta injiillada ee ku kaydsan Ciise muujintiisa ku aaddan Boqortooyada Ilaah, Yooxanaa waxa uu u diwaan gelinayaa caddaynta Ciise ee nolosha weligeed ah. Hadda ayaa qofku yeelan karaa! Boqortooyadu waa diyaarsan tahay!

■ NASB (UPDATED) TEXT: 10:11-18

¹¹Waxaan ahay adhijirka wanaagsan. Adhijirka wanaagsanu wuxuu naftiisa u bixiyaa idaha daraaddood. ¹²Kan ciidanka ah oo aan adhijirka ahayn, iduhuna aanay kuwiisa ahayn, kolkuu arko yeyda oo soo socota, wuu ka tagaa idaha oo ka cararaa. Markaasay yeydu qabsataa oo kala firdhisaa iyaga. ¹³Wuu cararaa, waayo, isagu waa ciidan uun, oo idaha waxba kama gelin. ¹⁴Waxaan ahay adhijirka wanaagsan; waan garanayaa kuwayga, kuwayguna waa i garanayaan, ¹⁵sida Aabbuhu ii garanayo, anna aan Aabbaha u garanayo; oo naftaydana waan u bixiyaa idaha daraaddood. ¹⁶Ido kale ayaan leeyahay oo aan kuwa xeradan ahayn, kuwaasna waa inaan keenaa, waxayna maqli doonaan codkayga, oo waxaa jiri doona adhi keliya iyo adhijir keliya. ¹⁷Sidaas daraadeed Aabbuhu waa i jecel yahay, waayo, naftaydaan bixiyaa inaan mar kale qaato. ¹⁸Ninna igama qaado, laakiin anaa iska bixiya. Waxaan leeyahay amar aan ku bixiyo, waanan leeyahay amar aan haddana ku soo qaato. Amarkan waxaan ka helay Aabbahay.

10:11, 14 “Waxaan ahay adhijirka wanaagsan” Kani waa magacii uu Masiixu lahaa Axdigii Hore dhexdiisa (cf. Yexesqeel 34:23; Sekariyaah 11; I Butros 5:4) iyo YHWH (cf. Sabuurada 23:1; 28:9; 77:20; 78:52; 80:1; 95:7; 100:3; Ishacyaah 40:11; Yeremyaah 23:1; 31:10; Yexesqeel 34:11-16).

Waxaa jira labo erey oo Giriig ah oo lagu tarjumi karo ereyga “wanaagsan”: (1) *agathos*, oo uu Yooxanaa ad iyo jeer u adeegsado shayada, iyo (2) *kalos*, oo Septuagint-ga lagu soo dhex isticmaalay oo wanaagga lagu tilaamayo in sharka looga soo hor jeesto. Axdiga Cusub dhexdiisa waxa ay leedahay macneyaasha “quruxda,” “magac ammaan leh,” “niyad,” iyo “mudnaan.” Labadan erey waxaa lagu wada adeegsaday iyagoo wada jir ah Luukos 8:15. Eeg tismada 8:12.

10:11 “Adhijirka wanaagsanu wuxuu naftiisa u bixiyaa idaha daraaddood” Tani waxa ay tilmaamaysaa booskii la yaabka lahaa ee uu Masiixu waaqdhaac ahaanta u galay (cf. aayadha. 11, 15, 17, 18). Wuxuu si mutadawacnimo ah naftiisii u jiiifiyey aadanaha dembiga badan aawadood. (cf. Ishacyaah 52:13-53:12; Markos 10:45; II Korintos 5:21). Nolol run ah, nolol haqab tiran waxa ay ku timaaddaa ama soo martaa oo qura dhimashadiisii.

Bruce M. Metzger buuggiisa, *A Textual Commentary on the New Testament* waxaa ku qoran tilmaan xiiso leh oo ku saabsan aayaddan:

Baddalkii qeexidda ‘in qof naftiisa hoos dhigo’ oo dabeecad ahaan ah adeegsiga Yooxanaa (10:15, 17; 13:37, 38; 15:13; I Yooxanaa 3:16), marqaati furro dhowr ah (P⁴⁵, N^{*}, D) waxa ay u taagan tahay qeexidda ‘in qof naftiisa bixiyo,’ oo ah tan injiillada dhexdooda laga arko (Matayos 20:28; Markos 10:45)” (Bogga 230).

10:14 “waan garanayaa kuwayga, kuwayguna waa i garanayaan” tan ayaa ah qaabka macnaha ereyga “garanaya” (ka eeg Mawduuc gaar ah 1:10). Sida Wiilku u garanyo Aabbaha, oo uu Aabbuhuna u garanyo Wiilka, sidaas oo kale, ayaa Ciise u yaqaan kuwa Isaga aamminta oo au iyaguna u yaqaannaan Isaga. Iyagu way “arkeen” oo ay “maqleen” (cf. aayadda. 4) oo way u jawaabeen (cf. 1:12; 3:16). Masiixiyaddu waa xidhiidh shaqsi ahaaneed (cf. 17:20-26).

10:15 “sida Aabbuhu ii garanayo, anna aan Aabbaha u garanayo” Tani waa taswiir soo noqnoqonaysa oo ku jirta Yooxanaa. Ciise ficil ahaan ayuu sameeyaa oo u uga hadlaa xidhiidhka ku dhow ee uu la leeyahay Aabbaha.

Qoraalka la yaabka leh eek u jira aayadaha 14-15 waa isku dhawaanshaha ka dhexeeya Ilaah iyo Wiilka oo la xidhiidha isku dhawaanshaha ka dhexeeya Wiilka iyo kuwa raacsan (cf. 14:23). Yooxanaa waxa uu diiradda saarayaa tilmaanta Cibraaniga ee ah “garanaya” u tixraacayaa in ay tahay xidhiidh dhow, ma aha dhacdo si kale ku imanaysa. Ciie wuu garanayaa Aabbaha, kuwa Ciise garanayana, way garanayaan Ilaah!

10:16 “Ido kale ayaan leeyahay oo aan kuwa xeradan ahayn,” Tani waa tilmaantii Ishacyaah 56:6-8. Dulucda macnuhu waxa uu tilmaamayaa in tani ay la xidhiidho (1) Sumeeriya (cf. 4:2-42) ama (2) Kaniisaddii Kuwii aan Yuhuudda ahayn (cf. 4:43-54). Tani waxa ay ka hadlaysaa midnimada ka dhexaysa kuwa rumaysta Masiixa. Axdiga Cusub waxa uu mideeyaa Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. Efesos 2:11-3:13; sidoo kale ka eeg tismada I Korintos 12:13; galatiya 3:28; Kolosay 3:11)! Bilowgii 3:15 iyo Yooxanaa 3:16 oo isku xidhan!

▣ **“oo waxaa jiri doona adhi keliya iyo adhijir keliya”** Tani waxa ay ahayd ujeedkii Ilaah uu had iyo goor rabay in uu smeeyo (cf. Bilowgii 3:15, 12:3; Baxniintii 19:5-6). Arrimaha fiqi ahaaneed eek u jira midnimadan waxaa lagu falanqaynayaa Efesos2:11-3:13 iyo 4:1-6.

10:17 “Sidaas daraadeed Aabbuhu waa i jecel yahay” Sidii Wiilka loogu qasbay in uu naftiisa bixiyo, Aabbaha looguma qasbin in uu bixiyo Wiilkiisa. Tan looma tarjuman karo in Ilaah abaal ku mariyey ninkii Ciise ahaa addeecistiisii (tani waa loogu yeedhaa korsi, ka eeg tasmada tafsiirka).

▣ **“naftaydaan bixiyaa inaan mar kale qaato”** Tani waxa ay tilmaamaysaa sarakiciddii. Axdiga Cusub dhexdiisa kan laga hadlayo ee mar kasta kicinaya Wiilka waa Ilaah (cf. 18b)si uu u muuiyo waaqdhaciisa aqbalka ah. Laakiin halkan waxaa lagu tilmaamayaa awoodda Ciise naf ahaantiisa eek u jirta sarakiciddiisa.

Weedhani waa mid aad u qiimo badan oo muuinaysa in Axdiga Cusub uu had iyo goor ka duulayo ama ujeedkiisu yahay shaqooyinka madaxfurashada ee saddexda shaqsi ee Ilaah isku ah.

1. Ilaaha Aabbaha ah ayaa sarakiciya Ciise (cf. Faalimaha Rasuullada 2:24; 3:15; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30, 33, 34, 37; 17:31; Rooma 6:4, 9; I Korintos 6:14; II Korintos 4:14; Galatiya 1:1 Efesos 1:20; Kolosay 2:12; I Tesaloniika 1:10)
2. Ilaaha ah Wiilka ayaa naf ahaantiisa isa sarakiciyey (cf. Yooxanaa 2:19-22; 10:17-18)
3. Ilaaha ah Ruuxa ayaa sarakiciyey Ciise (cf. Rooma 8:11)

10:18 “Waxaan leeyahay amar aan ku bixiyo” Kani waa isla ereygii lagu isticmaalay 1:12. Waxaa loo tarjumi karaa “amarka,” “xuquuq sharci ah,” ama “awood.” Aayaddani waxa ay muujinaysa awoodda iyo amarka Ciise.

NASB (UPDATED) TEXT: 10:19-21

¹⁹Yuhuuddu haddana way kala qaybsameen hadalladaas aawadood. ²⁰Badidood waxay yidhaahdeen, Jinni buu qabaa, wuuna waalan yahay, ee maxaad u maqlaysaan? 21 Qaar kale waxay yidhaahdeen, Hadalladaasu ma aha kuwa nin jinni qaba. Jinni miyuu indhaha u furi karaa nin indha la'?

10:19 Maaddaama ay jireen saddex arrin oo kala qaybsan oo ku saabsan ciie sida ku jirta 6:52; 7:12, 25, 43; 9:8-9, 16; 10:19-21; 11:36-37, muuqaalkani Yooxanaa oo dhan ayuu ku sii dhex socon doonaa. Arrinta la yaabka leh ee ah in qaar ay qaadanayaan injiilka qaara ay diidayaan waa xiisaddii u dhexaysay doorashadii hore iyo doorashada xorta ah ee aadanaha!

10:20 “Jinni buu qabaa, wuuna waalan yahay” Tani waa eedayn iska caan ah oo Ciise looga soo hor jeeday labo sabab awgeed.

1. Aayaddan dhexdeeda, sida tan 7:20, waxay adeegsadeen in Ciise uu qabo jirro maskaxeed
2. Iska eedayntan oo kale waxaa loo adeegsaday kuwii aan Yuhuudda ahayn markii ay isku dayeen in au sharraxaan halka ay Ciise awooddiisu ka imanayso (cf. 8:48, 52)

10:21 Labo su'aalood ayaa ku jira aayadda. 21.

1. Aayadda. 21a wuuleeyahay *ouk*, oosugaysa “haa” ama jawaab
2. Aayadda. 21b wuuleeyahay *me*, oo sugaysa “maya” ama jwaab

Ka eeg James Hewett, *New Testament Greek*, bogga 171. Aayaddani waxa ay muujinaysaa, arrintu si kastaba ha haatee, sida xieerar adadag oo daddad badan ay ugu jiraan Giriig Koine. Sida macnaha guud uu yahay ma jiro, ma jiro hab naxwe ahaaneed oo go'aan gaadhista leh.

Hogsiintii kuwa indhaha la' waxa ay calaamad u ahayd Masiixa (cf. Baxniintii 4:11; sabuurrada 146:8; Ishacyaah 29:18; 35:5; 42:7). Waxaa jirta fal-dhac halkan loogu sheegayo in indho la'aanta Israa'iil (cf. Ishacyaah 42:19) ay tahay sida tii lagu sheegay cutubka 9-aad.

doontaa? Haddii aad Masiixa tahay bayaan noogu sheeg. ²⁵Ciise ayaa ugu jawaabay, Waan idiin sheegay, idinkuse ma rumaysnidin. Shuqullada aan magaca Aabbahay ku sameeyo ayaa ii marag fura, ²⁶laakiin ma rumaysnidin, waayo, idahayga ka mid ma ihidin. ²⁷Idahaygu codkaygay maqlaan, waanan garanayaa iyaga, wayna i raacaan. ²⁸Oo waxaan iyaga siiyaa nolosha weligeed ah, weligoodna ma lumi doonaan, oo ninna kama dhufsan doono gacantayda. ²⁹Aabbahaygii i siiyey iyaga ayaa wax walba ka weyn, oo ninna kama dhufsan karo gacanta Aabbahay. ³⁰Aniga iyo Aabbuhu mid baannu nahay.

10:22 “lidda Daahirinta” Josephus waxa uu midaan ugu yeeraa “lidda iftiinada.” Xilligeennan hadda ah waxa loo yaqaan Hanukkah. Waxa ay ahayd iid siddeed maalmood ah oo dhacaysay dhexdhexaadka bidha Diseember. Waxaa loo dabaal degayayey daahirinta macbudka ku yaal Yeruusaalem kaddib guushii xoogga ee Judas Maccabeus ee 164 B. C. sannadkii 168 B.C., Antiochus IV Epiphanes, oo ahaa hoggaamiyihii Seleucid, ayaa isku dayey in uu Yuhuudda ku qasbo in ay sameeyaan ficillo diimeed loo yaqaan Hellenistic Practices (Daanyeel 8:9-14). Waxa uu macbudkii Yeruusaalem ka dhigan meel xaj u ah kuwa aan diinta lahayn oo xitaa meesha ugu wada qudduusan wax loogu bixiyo Zeus. Yudas Maccabeus oo ah mid ka mid wiilashii wadaadkii Modin, ayaa cayriyey hoggaamiyahan reer Suuriya oo nadiifiyey oo dib u daahiriyey macbudkii (cf. I Maccabeus 4:36-59; II Maccaabeus 1:18).

Yooxanaa waxa uu iidaa Yuhuudda u adeegsanaya arrin ah in uu calaaladahooda Isagu ugu muujiyo hoggaaminta Yuhuudda, kuwa u dhashay Jeruusaalem, iyo kuwa isugu yimaada xaj ahaanta (cf. cutubyada 7-11).

▣ **“Balbalada Sulaymaan”** Tani waxa ay ahayd meel dusha laga daboolay oo ku taal dhanka galbeed ee Maxkamadda Dumarka oo ah halkii Ciise wax ku baray. Josephus waxa uu sheegay in ay ka badbaadday burburkii Baabilyoon ee 586 B.C.

10:23 “waxayna ahayd wakhtiga qabowga.” Tani waa faahfaahin maragfur ah.

10:24 “Haddii” Tani waa jumlad xaaladeed heerka koowaad ah taasoo uu qoraagu ku caddaynayo runta uu ujeedooyinkiisa ka sugayo. Waxaa jira jumlado xaaladeed heerka koowaad ah oo ku jira macnahan guud (cf. aaydaha. 24, 35, 37, iyo 38). Adeegsigan ku jira aayadda. 24 waxa ay muujinaysaa in isku xidhkan loo adeegsan karo macne toos ah. Kuwa aan Yuhuudda ahayn si run ah uma aysan rumaysnayn in Ciise ahaa Masiixa; waa ay jirrabayeen oo .

▣ **“bayaan noogu sheeg”** Waxaa jira dhowr shay oo looga faalloonayo aayaddan. Koow, Ciise masaal ayuu wax ku baray, luuqad maldahan, hadallo aan si toos loo odhan. Dadkan badan ee macbudka joogay waxa ay doonayeen in uu si cad isu muujiyo. Ka eeg Mawduuc Gaar ah: *parrhesia* 7:4

Tan labaad, Yuhuuddu xilligii Ciise ma aysan filayn in Ilaah jidh soo qaadanayo. Ciise waxa uu si muuqaal ah ugu tilmaamay hal ahaanshaha uu la wadaago Ilaah isagoo dhowr dhacdo ugu tilmaamay (cf. 8:56-59), laakiin sida macnaha guud yahay waxa ay isaga si gaar ah u weyddiinayaan waxa ku saabsan Masiixa. Yuhuuddu waxa ay filanayeen in midkan la subkay ama la boqray uu sidii Muuse oo kale sameeyo (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15, 19). Ciise waxa uu si sax ah u sameeyay atn ku jirta cutubka 6-aad shaqooyinkan waxa ay kaamilayaan wax-sii-sheegidyadii Axdigii Hore, gaar ahaan bogsintii kuwii indhaha la’aa (ee cutubka 9-aad). Way haysteen dhammaan caddaymihii ay u baahnaayeen. Dhibaatadu waxa ay ahayd in Ciise uusan buuxin filashooyinkii ay Masiixa ka filanayeen, ciidan ahaan, quruun ahaantooda.

10:25 “Shuqullada aan magaca Aabbahay ku sameeyo ayaa ii marag fura” Ciise ayaa u tilmaamay in ficilladiisu ay xaqiijinayaan waxa uu ku doodayo (cf. 2:23; 5:36; 10:25, 38; 14:11; 15:24).

10:26 Alla Muxuu hadal argaggax leh yahay!

10:28 “waxaan iyaga siiyaa nolosha weligeed ah” Nolosha weligeed ah dabiici ahaan waa tayo iyo tiro labadaba. Waa nolosha faca cusub. Waxaa hadda lagu heli karaan rumaysadka Masiixa (cf. 3:36; 11:24-26).

NASB (UPDATED) TEXT: 10:22-30

²²Waxay ahayd lidda Daahirinta Macbudka xagga Yeruusaalem, waxayna ahayd wakhtiga qabowga. ²³Ciisena wuxuu dhex socday macbudka xagga Balbalada Sulaymaan. **24** Yuhuuddu haddaba waxay isugu soo urureen hareerihisa oo ku yidhaahdeen, Tan iyo goormaad shaki nagu sii wadi

▣ **“weligoodna ma lumi doonaan, oo ninna kama dhufsan doono gacantayda”** Tani waa labo diidmo, waxaa la socda fal mustaqbalka ah. Kani waa mid ka mid ah cutubyada ku saabsan aamaanka rumaystaha meel kasta oo Axdiga Cusub ka mid ah (cf. 6:39). Waa wax iska cad in waxa keliya ee jacaylka Ilaah naga goyn kara ay tahay nafteenna (cf. Rooma 8:38-39; Galatiya 5:2-4). Hubsashadu (cf. Ka eeg Mawduuc gaar ah I Yooxanaa 5:13) waa in ay noqotaa mid adkaanteenna ku qiyaasan (Ka eeg Mawduuc Gaar ah 8:31). Hubsashada aasaaskeedu waa in ay ahaadaan dabecadda iyo falimaha saddexmidnimada Ilaah.

Injiilka Yooxanaa waxa uu tilmaamayaa hubsashada kuwa sii wada in ay rumaysnaadaan Masiixa. Waxa uu rumaysadkaasu ku bilowdaa go'aanka bilowga tawbadkeenka iyo rumaysadka waxa uuna ku sii socda qaab nololeed rumaysad leh. Dhibaataada fiqi ahaaneed waxa ay noqonaysaa marka aan xidhiidhkan aan u baddalanno sida wax soo saar aan innagu iska leenahay (oo “mar lagu badbaadayo, ama had iyo goor lagu badbaadayo”). Rumaysadka aan joogsiga lahayn ayaa ah addeecidda badbaadada runta ah (cf. Cibraaniyada, Yacquub, iyo I Yooxanaa).

10:26

NASB, NKJV

“weligoodna ma lumi doonaan, oo ninna kama dhufsan doono gacantayda”

NRSV

“Wixii Aabbahay I siiyey baa wax kastoo kale ka weyn”

TEV

“Wixii Aabbahay I siiyey ayaa wax walboo kale ka weyn”

NJB

“Abbihi, waxan I siiyey, ayaa mid kasta ka weyn”

Su'aashu waxa ay tahay ayaa aha fal lagu sameeya weedha, “ka weyn”: (1) Dadkii Ilaah siiyey Ciise (NRSV, TEV) ama (2) Ilaah naf ahaantiisa (NASB, NKJV, NJB). Qaybta labaad ee aayaddani waxa ay tilmaamaysaa in qof isku dayayo in u xado kuwa Ciise raacsan. Fiqi ahaan arrinta labaad ayaa ah tan ugu fiican. Ka eeg Mawduuc Gaar ah oo ku saabsan Hubsashada 6:37.

Kani waa mawduuc cajiib ah oo ku saabsan hubshashada runaystaha oo aasaaskeedu yahay awoodda Aabbaha! Amaanka rumaystaha, si la mid ah sida runta kale eek u jirta Kitaabka Qudduuska ah, waa xiisad buuxsantay, waa tilmaan axdi. Rajada rumaystaha iyo hubsashada badbaadada waxa ay ku dhex jiraan dabecadda Ilaaha sarreeya, naxariistiisa iyo nimcadiisa. Arrintu si kastaba ha ahaatee, rumaystuhu waa in uu ku sii socdaa rumaysad. Badbaadadu waxa ay ku bilaabantaa go'aan uu ruuxu hoggaaminayo oo ah tawbadkeen iyo rumaysad. Waa in sidoo kale ay soo saartaa tawbadkeen, rumaysad, ama iimaan, adeecis, iyo sugnaan aan kala joogsi lahayn! Badbaadadu ma aha wax soo saar (caymis nololeed, ama tigidh jannada lo goosanayo), laakiin xidhiidh shaqsi ahaaneed oo lala yeelanayo Ilaah iyadoo masiixa loo soo marayo.

Dhacdada ay ku soo gabogaboobayso xidhiidh toos ah oo Ilaah lala yeesho waa nolol is beddeshay oo isku beddelaysa runaysad iyo adeeg ay Isaga u adeegto (cf. Matayos 7). There is such little biblical evidence for carnal Christians (cf. I Korintos 2-3). Arrinku waa in hadda loo ekaado Masiixa, ma aha jannada marka annu dhimanno. Ma jiro amaan iyo hubsashu aanu Kitaabka Qudduuska ahu au hayn kuwa soo koraya, adeegaya, ee xitaa dembiga la hardamaya. Laakiin, midho la'aan, xidid ma yimaado! Badbaadadu waa rumaysad oo keliya, rumaysad oo keliya ayey ku timaaddaa, laakiin badbaadada runta ahi wa in ay soo saartaa “shuqullo wanaagsan” (cf. Efesos 2:10; Yacquub 2:14-26).

10:30-33 “Aniga iyo Aabbuhu mid baannu nahay. . . Markaasay Yuhuuddu haddana dhagaxyo u gurteen inay dhagxiyaan” Kani waa hadal xooggan oo ku saabsan Ciise Masiix-ahaantiis (inuu yahay Masiixa) iyo Ilaahnimadiisa

(cf. 1:1-14; 8:58; 14:8-10, gaar ahaan 17:21-26, oo sidoo kale adeegsanaysa ereyga “mid ama hal”). Yuhuuddu way fahmeen gebi ahaanba waxa uu sheegayey oo waxa ay u tirsadeen sidii aflagaaddo (cf. aayadda. 33; 8:59). Waxay damacsanaayeen in au dhagxiyaan iyagoo sal uga dhigaya Laawiyaantii 24:16.

Iska hor imaadyadii hore eek u aaddanaa qof ahaanta Masiixa (tusaale ahaan, *Arius* – Kan curadka ah; *Athanasius* –Ilaah buuxa) aayadda. 30 iyo 14:9 waxaa had iyo goor loo adeegsan jiray Athanasius (ka eeg *The Cambridge History of the Bible*, qaybta 1, bogga 444). Xagga “Arianism-kana” ka eeg tafsiirka dheeraadka ah Glossaray.

10:31 Aayaddani waxa ay ka xidhiidhaa hadalkii Ciise ee aayadda. 30. Ciise waxa uu eedayntoodii kaga jawaabay dood aan caadi ahayn oo ku saabsan sharcigii Yuhuudda. Aasaas ahaan waa qaabka ereyga *Glohim*, oo Axdigii Hore noqonaysa Ilaah (cf. Bilowgii 1.) laakiin habku waa jamac loo adeegsan jiray malaa'igaha iyo hoggaamiyeyaasha aadanaha. Ka eeg Mawduuc gaar ah: Magacyada Ilaah 6:20.

10:32 Adhijirka wanaagsan (*kalos*) shuqullo wanaagsan (*kolas*) ayuu u qabtaa Aabbaha.

10:34 “Miyaanay ku qornayn sharcigiinna” Ciise waxa uu ka soo xigtay Sabuurrada laakiin waxa uu ugu yeerayaa “sharciga” (tusaale ahaan, macnaha tawreed waa “wax-baridyo,” cf. 12:34; 15:25; Rooma 3:9-19). Ereyga sharci waxa uu had iyo gooraale la xidhiidhay qoraalladii Muuse (Tawreed), Bilowgii iyo Sharciga Ku Noqoshadiisa. Tani waxa ay muujinaysaa adeegsiga weyn ee ereyga si uu u daboolo Axdiga Cusub oo dhan.

▣ **“Idinku waxaad tihiin ilaahyo?”** Ciise waxa uu adeegsanayaa xigasho uu ka soo xigtay Sabuurka 82:6. Waxaa ku jira ereyga *Elohim* si uu ula xidhiidhiyo xaakinnada aadanaha (ka eeg *Elohim* Mawduuca Gaarka ah 6:20.) xaakinnadan (inkastoo ay shar ahaayeen) waxaa iyaga lagu magacaabay “wiilasha Kan ugu wada Sarreeya.” Yuhuuddani waxa ay weeraryeen Ciise maxaa yeelay inkastoo uu ahaa nin waxa uu ku andacoonayey in uu yahay (1) Wiilka Ilaah iyo (2) kan Ilaah ka jira. Welise rag kale (cf. baxniintii 4:16; 7:1; 22:8, 9; Sabuurrada 82:6; 138:1) ayaa waxaa loogu yeedhay “ilaahyo.”

Ciise la doodistiisii kuwa sharciha waxaad mooddaa in ay tahay qadkan: Qorniinnadu waa run, niman ayaa loogu yeedhay *elohim*, haddaba, sababtee ayaad iigu yeedhaysaan in aan ahay aflagaaddoole anoo isku tilmaamaya in aan ahay Wiilka Ilaah? Ereyga *Elohim* waa jamac afka Cibraaniga Axdigii Hore Dhxdiiisa waxaa loo adeegsada sidii keli ama hal erey. Ka eeg Mawduuc Gaar ah: Magacyada Ilaah 6:20. Kani waa doorka uu Yooxanaa ereya ahaan adeegsado: (1) Erey labo tilmaamood leh iyo (2) iyo su’aal Qiriig ah oo sugaysa “haa” jawaab.

10:35 “(oo Qorniinkana lama jebin karo)” Yooxanaa waxa uu had iyo goor amar ku bixiyaa hadalladii Ciise. Lama hubo in hadalkini uu yahay kii Ciise iyo Yooxanaa. Arrintu si kastaba ha haatee, maaddaama labadana si iku mid ah ay u yihiin waxigii Ilaah, wax dhib ahi kuma sugna. Runta soo xigashadu waa aamminnimada Qorniinka. Ciise iyo rasuulladuba waxa ay isku argti ka yihiin hadalkooda iyo Axdiga Cusub iyo kii nebiyadii hore Axdigii Hore ay labaduba yihiin ereyada Ilaah (cf. Matayos 5:17-19. I Korintos 2:9-13; I Tesaloniika 2:13; II Timoteyos 3:16; I Butros 1:23-25; II Butros 1:20-21; 3:15-16).

Bishop H. C. G. Moule sida ku jirta *The Life of Bishop Moule*, waxa uu odhanayaa

“Isaga oo ah [Masiixa] ayaa dhabtii aamminay Baybalka, oo waxaa jira shayo oo maaddaama wax I beddeli kara aanay jirin, ma doonayo in aan ku socdo dareen indho la’aan ah laakiin in aan Kitaabka addeeco Isaga awgii” (bogga 138).

10:36 Aayaddan dhexdeeda Ciise waxa uu ku doodayaa in Aabbuhu doortay (ama “barakadeeyay” ama “qudduus ka dhigay”) Isaha oo uu u soo diray in uu yahay (Masiixa). Wuxuu si hubaal ah u haystaa shuruud lagu yidhaahdo ama loogu yeedho “Wiilka Ilaah.” Sidii xaakinnadii reer Binu Israa’iil ay wakiillo ugu ahaayeen Ilaah (cf. Sabuurrada 82:6), ayuu Isaguna wakiil uga yahay Aabbaha erey ahaan iyo wax qabad ahaa. Ka eeg Mawduuc Gaar ah: soo diray (*Apostellō*) 5:24.

10:37 Tani dhab ahan waxa ay aayadaha. 19-21 sheegayn. Ciise mucjisooyinkiisu waxa ay tilmamaya wax qabadka Ilaah.

NASB (UPDATED) TEXT: 10:31-39

³¹Markaasay Yuhuuddu haddana dhagaxyo u gurteen inay dhagxiyaan. ³²Ciise ayaa ugu jawaabay, Shuqullo badan oo wanaagsan ayaan idinka tusay xagga Aabbahay. Shuqulladaas kee baad igu dhagxinaysaan? ³³Yuhuuddu waxay ugu jawaabeen, Shuqul wanaagsan aawadiis kugu dhagxin mayno, laakiin caytanka aawadiis iyo inaad adigoo nin ah Ilaah iska dhigayso. ³⁴Ciise wuxuu ugu jawaabay, Miyaanay ku qornayn sharcigiinna, Waxaan idhi, Idinku waxaad tihiin ilaahyo? ³⁵Hadduu Ilaah kuwii hadalkiisu u yimid ku sheegay ilaahyo (oo Qorniinkana lama jebin karo), ³⁶ma waxaad ku leedihiin kii Aabbuhu qodus ka dhigay oo xagga dunida u soo diray, Waad caytanta, waayo, waxaan idhi, Wiilka Ilaah baan ahay? ³⁷Haddaan Samayn shuqullada Aabbahay, ha i rumaysanina. ³⁸laakiin haddaan sameeyo, hl kastoo aydaan i rumaysanayn, shuqullada rumaysta, inaad ogaataan oo garataan in Aabbuhu igu jiro, anna Aabbaha aan ku jiro. ³⁹ Sidaa aawadeed mar kale ayay dooneen inay qabtaan, wuuna ka baxsaday gacantooda.

NASB (UPDATED) TEXT: 10:40-42

⁴⁰Haddana wuxuu u baxay Webi Urdun shishadiisa ilaa meeshii Yooxanaa markii hore ku jiray, isagoo dad ku baabtiisaya, meeshaasuuna joogay, ⁴¹Oo qaar badan baa u yimid isaga, waxayna ku yidhaahdeen, Runtii Yooxanaa calaamo ma samayn, laakiin wax walba oo Yooxanaa ka yidhi ninkan run bay ahaayeen. ⁴²Kuwa badan baana halkaa ku rumaystay isaga.

10:37, 38 “haddii. .haddii” Kuwani jumlado xaaladeed heerka koowaad ah. Ciise wuxuu qabtay shuqulladii Ilaah. Haddii ay sidaas tahay, dabdeed Isaha ayey rumayn lahaayeen, in si kalsooni leh Isaga iyo Aabbuhu mid yihiin. (cf. 30, 38). Eeg Mawduuc Gaar ah: Ku jira I Yooxanaa 2:10.

10:39 Middan dhowr jeer ayaa Ciise u sheegay kuwii doonayey in ay dhaawacaan Isaga (cf. Luukos 4:29-30; Yooxanaa 8:59). Ma cadda in baxsashooyinkan ay ahaayeen (1) dhacdo layaab leh ama (2) iyo in ay tahay tii uu jidh ahaanta ciise kala midka ahaa dadka kale, taasoo u sababtay in dadkii badnaa ku dhex milmo.

10:40 Tani waxa ay la xidhiidhaa gudbiddii webi Urdun uu ka yimid dhanka Yeriixoo, oo ku dhow magaalo lagu magacaano Baytani.

10:41 Weli Yooxanaa waxa uu muujinayaa Yooxanaa Baabtiisaha muujintiisii Ciise (cf. 1:6-8, 19-42; 3:22-30; 5:33)! Tani waxa ay baabbi'inaysaa adkaanshihii asalka eek u xayndaabnaa Yooxanaa Baabtiisaha.

10:42 Sidii hoggaamiyeyaashii Yuhuuddu u diideen Ciise, sidaas oo kale ayaa dad badan oo caadi ahuba (waa dadkii dhulkaase) ay jawaab rumaysad ugu jawaabeen Isaha (cf. 2:23; 7:31; 8:30). Ka eeg Mawduuc Gaar ah: 2:23.

SU'AALO FALANQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeena kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su'aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Muxuu Yooxanaa tilmaama isugu qasaa mar kasta (tusaale ahaan: “Ciise waa illinka xerada adhiga iyo adhijirka wanaagsan”)?
2. Muxuu yahay aasaaska Axdigii Hore ee Yooxanaa 10?
3. Maxa tahay muhiimadda Ciise Masiix eek u jirta in uu naftiisa bixiyo?
4. Maxay Yuhuuddii u sii wadeen in ay Ciise ku tilmaamaan in uu yahay mid jin ka buuxo?
5. Sababtee ayey shuqulladii Ciise muhiim u yihiin?
6. Sidee ayaan “ammaanka runaystaha” ula xidhiidhsiiin karnaa “baaqi ahaanshaha kuwa subkan?”

YOOXANAA 11

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Dhimashadii Lasaros 11:1-16	Dhimashadii Lasaros 11:1-16	Dhimashadii Lasaros 11:1-6 11:7-16	Dhimashadii Lasaros 11:4 11:55-7 11:8 11:9-11 11:12 11:13-15 11:16	Sarakiciddii Lasaros 11:1-4 11:5-10 11:11-16
Ciise Sarakicidda iyo Nolosha 11:17-27	Inigu waxaan ahay Sarakicidda iyo Nolosha 11:17-27	11:17-27	Ciise Sarakicidda iyo Nolosha 11:17-29 11:20-22 11:23 11:24 11:25-26 11:27	11:17-27
Ciise oo ooyaya 11:28-37	Ciise iyo Dhimashada, Cadawga ugu Dambeeya 11:28-37	Ciise oo ooyaya 11:28-37	11:28-31 11:32 11:33-34a 11:34b 11:35-36 11:37	11:28-31 11:32-42
Lasaros oo Noloshee ku soo Laabtay 11:38-44	Lasaros oo dhimashadii ka Sara Kacay 11:38-44	11:38-44	Lasaros oo Noloshee ku soo Laabtay 11:38-39a	

				11:39b	
				11:40-44	
					11:43-44
Shirqoolkii Dilayey Ciise	Lagu	Shirqoolkii Dilayey Ciise	Lagu	Hirqool Looga Soo Hor Jeedo Ciise	Hoggaamiyeyaashoo Yuhuudda oo Gu'aaminaya Dhimashadii Ciise
11:45-53		11:45-57	11:45-53	11:45-48	11:45-54
					11:469-52
					11:53-54
11:54			11:54		Iidda Kormaridda oo Sheegaysa Dhawaasho Soo
11:55-57		11:55-57	11:55-57	11:55-57	11:55-57

AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga v)g

ADIGA OO RAACAYA UJEEDEKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafsiiro lahayd. Midkeena kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiiirka. Waa in aadan midan ula tegin qof kuu tafsiiira..

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

5. Baaragaraaf-ka koowaad
6. Baaragaraaf-ka labaad
7. Baaragaraaf-ka saddeexaad
8. IWM.

SOO KOOBID FIQI AHAANEED

Muhiimadda fiqi ahaaneed ee Cutubka 11 waa:

1. Soo bandhigidda awoodda iyo amarka Ciise oo socda.
2. Dhimashadii Laasaros waa qorshe Ilaah uu fursad ku siinayey Ciise in uu ku ammaanmo 9cf. 9:3)
3. Wada hadalkii Marta ay la yeelatay Ciise waxa uu keenayaa fursad qirashadeeda weyn ah iyo Ciise is muujintiisa dheeraadka ah (tusaale ahaa, sarakicidda iyo nolosha, aayadda. 25).
4. Ciise hadda ayuu bixiyaa nolosha weligeed ah (sida maalinta xukunka laga xaqiiqsan karo). Tan waxaa calaamo u ah sarakiciddii Laasaros. Ciise waxa uu leeyahay awood uu dhimashada ku xakameeyo!
5. Xitaa iyadoo la wajahay mucjisadan awoodda leh, rumaysad-darradu way sii socotaa (tusaale ahaan, dembiga aan la qaadi karin, ka eeg Mawduuc Gaar ah 5:21)1

NASB (UPDATED) TEXT: 10:1-6

¹Waxaa jiray nin buka oo ah Laasaros reer Beytaniya ee joogay tuulada Maryan iyo walaasheed Maarta. ²Maryantaasu waxay ahayd tii Rabbiga cadar marisay oo caghiisa timaheeda ku tirtirtay, oo walaalkeed Laasaros bukay. ³Sidaa aawadeed walaalihii fariin bay Rabbiga u direen iyagoo leh, Sayidow, ogow, kii aad jeclayd waa bukaa e. ⁴Laakiin Ciise markuu taas maqlay wuxuu yidhi, Bukaankanu kan dhimashada ma ahaa, laakiin waa ammaanta Ilaah aawadeed in Wiilka Ilaah lagu ammaano. ⁵Ciise ayaa jeclaa Maarta iyo walaasheed iyo Laasaros. ⁶Sidaa aawadeed markuu maqlay inuu buko, laba maalmood oo kale ayuu meeshuu joogay iska sii joogay. ⁷Markaas dabadeed ayuu xertii ku yidhi, Yahuudiya aan haddana tagno. ⁸Xertii waxay ku yidhaahdeen, Macallimow, Yuhuuddu waxay haddana doonayeen inay ku dhagxiyaan, ma waxaad mar kale u kacaysaa meeshaas? ⁹Ciise ayaa ugu jawaabay, Maalintu miyaanay laba iyo toban saacadood ahayn? Qof hadduu maalinta socdo ma turunturoodo, waayo, wuxuu arkaa iftiinka dunidan. ¹⁰Laakiin qof hadduu habeenka socdo, wuu turunturooda, waayo, iftiinku kuma jiro isaga. ¹¹Waxyaalahaas ayuu ku hadlay, oo dabadeedto wuxuu ku yidhi iyaga, Saaxiibkeen Laasaros waa hurdaa, laakiin waan u tegayaa inaan soo toosiyo. ¹²Sidaa daraaddeed xertii waxay ku yidhaahdeen, Sayidow, hadduu hurdo wuu bogsanayaa. ¹³Ciise wuxuu ka hadlayay dhimashadiisa, iyaguse waxay u maleeyeen inuu ka hadlayo nasashada hurdada. ¹⁴Ciise haddaba ayaa bayaan ugu yidhi, Laasaros waa dhintay. ¹⁵Anigu waa ku faraxsanahay aawadiin inaan halkaas joogin si aad u rumaysataan, laakiin aan u tagno. ¹⁶Sidaa aawadeed Toomas, kii Didumos la odhan jiray, wuxuu ku yidhi xertii la socotay, Innaguna aan tagno si aynu ula dhimanno.

11:1 “Waxaa jiray nin buka” Kani waa fal xilliyeed aan kaamil ahayn. Tani waxa ay caddaynayaa in uu jiranaa waqti aad u dheer. Arrintu si kastaba ha ahaatee, fal xilliyeedkan aan kaamilka anahn waxaa loo tarjumi karaa “bilaabay in uu jirado.”

▣ **“Laasaros”** Magacan afka Cibraaniga waa “Eleazer” “Ilaah baa caawiya” ama “Ilaah waa caawiye.” Yooxanaa waxa uu u maleeyay in akhristayaashu ay garanayeen Ciise saaxiibtinimadiisii Marta iyo Laasaros (cf. Luukos 10:38-42, oo ah sheegidda qura ee iyaga lagu sheegay injiillada dhexdooda).

▣ **“Beytaniya”** Tani waa meel ka duwan Beytaniya-dii lagu sheegay 1:28 iyo 10:40, ee Yeriixoo ku dhawayd ee Webiga Urdun. Beytaniyadan waxa ay labo mayl dhanka koonfureed ka xigtaa oo ay isku aag yihiin Buur Saytuun. Halkani waxa ay ahayd meeshii uu hodheel ahaan Ciise aadka u jeclaa ee Yerusaaalem.

▣ **“Maryan”** Kani waa magaca Cibraaniga ah ee “Maryama.”

▣ **“Maarta”** Kani waxa uu afka Aramaygga ku noqonayaa “mistress.” Waa mid aan caadi ahayn in Maarta, oo tii ugu weynayd ah aan la sheegin marka koowaad; oo ay la xidhiidhi karto Luukos 10:38-42.

11:2 “Maryantaasu waxay ahayd tii Rabbiga cadar marisay oo caghiisa timaheeda ku tirtirtay” Aayadda labaad waa ku darid tafatirid ah oo uu Yooxanaa leeyahay (tusaale ahaan, TEV, NET). Sababtan ay Maryantani ugu go’doontay (cf. 12:2-8)waa kuwo ay ka siman yihiin labadaba Matayos (cf.26:6-13) iyo Markos (cf. 14:3-9). Haweeneydan waxaa isla sheegid tan la mid ah lagu sheegay Luukos 7:36ff waa naaf kale.

Aayaddani waxa ay tilmaamaysaa dhacdo aan weli lagu kaydin ama lagu diwaan gelin Injiilka. Waxaa lagu diiwaan geliyey cutubka 12-aad. Kuwo badan ayaa waxa ay u maleeyaan in tani ay tilmaamayso in Yooxanaa uu akhristayaashiisa ka filanayey in ay kale u gartaan qoyskiisa.

MAWDUUC GAAR AH: SUBKIDDA KU JIRTA BAYBALK (BDB 603)

- A. Waxaa loo adeegsaday qurxin (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 28:40; Ruut 3:3; II Samuu’eel 12:20; 14:2; II Boqorrada 28:15; Daanyeel 10:3; Caamoos 6:6; Miikaah 6:15)
- B. Waxaa loo adeegsaday martida (cf. Sabuurrada 23:5; Luukos 7:38,46; Yooxanaa 11;2)

- C. Waxaa loo adeegsaday bogsiin (cf. Ishacyaah 6:1; Yeremyaah 51:8; Markos 6:13; Luukos 10:34; Yacquub 5:14) [waxaa loo adeegsaday hab nadaafadeed sida ku jirta Yexesqeel 16:9]
- D. Waxaa loo adeegsaday u diyaarinta aaska (cf. Bilowgii 50:2; II Boqorrada 16:14; Markos 16:1; Yooxanaa 12:3,7; 19:39-40)
- E. Waxaa loo adeegsaday hab diin ahaaneed (cf. shay ay tahay in la sameeyo, cf. Bilowgii 28:18,20. 31:12 [tiir ama rugni]; Baxniintii 29:36 [maasha qudduuska ah]; Baxniintii 30:26; 40:9-16; Laawiyiintii 8:10-13; Tirintii 7:1 [Teendhada])
- F. Waxaa loo isticmaalay soo xaraynta hoggaamiyeyaasha
 - 1. Wadaaddada
 - a. Haaruun (Baxniintii 28:41; 29:7; 30:30)
 - b. Haaruun wiilashiisii (Baxniintii 40:15; Laawiyiintii 7:36)
 - c. Erey magac ahaan loo adeegsan jiray (Tirintii 3:3; Laawiyiintii 16:32)
 - 2. Boqorrada
 - a. Xag Ilaah (cf. I samuu'eel 2:10; II samuu'eel 12:7; II Boqorrada 9:3,6,12; sabuurrada 45:7; 89:20)
 - b. Xagga nebiyada (cf. I samuu'eel 9:16; 10:1; 15:1, 17; 16:3,12-13; I Boqorrada 1:45; 19:15-16)
 - c. Xagga wadaaddada (cf. I Boqorrada 1:34,39; II Boqorrada 11:12)
 - d. Xagga hogaamiyeyaasha (cf. Xaakinnada 9:8,15; II samuu'eel 2:7; 5:3; II Boqorrada 23:30)
 - e. Ciise in uu yahay Masiixa ah boqorka (cf. sabuurrada 2:2; Luukos 4:18 [Ishacyaah 61:1]; Falimaha Rasuullada 4:27; 10:38; cibraaniyada 1:9[Sabuurrada 45:7])
 - f. Kuwii Ciise raacsanaa (cf. II Korintos 1:21; I Yooxanaa 2:20,27 [*chirmsa*])
 - 3. Sida macquulka ah nebiyada (cf. Ishacyaah 61:1)
 - 4. Qalab rumaysad darrada loogu soo jiido xagga Ilaah
 - a. Kuuros (cf. Ishacyaah 45:1)
 - b. Boqorkii Turos (cf. Yexesqeel 28:14, halkaasoo uu adeegsanayo tilmaamaha Edom)
 - 5. Erey ama Magac “Masiixa” macnihiisu waa “midka la subkay” (BDB 603)

11:3 “walaalihii farriin bay u direen Isaga” Farriin ayey u soo direen Ciise, oo jooga Perea, dhinaca Urdun.

▣ **“kii aad jeclayd waa bukaa”** Tani waxa ay muujinaysaa Cisise xidhiidhkiisa qaaska ah ee uu la lahaa goyskan. Kani waa ereyga Giriigga, *phileo*. Arrintu si kastaba ha ahaatee, sida ku jirta Giriigga Koine, ereyga *phileo* iyo *agapao* waa kuwo la isku beddeli karo ama is beddeli kara (cf. aayadda. 5; 3:35; 5:20)

11:4 “Bukaankanu kan dhimashada ma ahaa, laakiin waa ammaanta Ilaah aawadeed” Tani waxa ay tilmaamaysaa in Ciise ogaa in Laasaros uu jiranaa. Waxa ay ahayd in uu u oggolaado in uu dhinto si Aabbuhu Awooddiisa uga dhex muujiyo Isaga oo uu midkan ka soo sarakiciyo kuwa dhintay. Jirrada iyo silicu mararka qaar waa doonista Ilaah (cf. 9:3; Kitaabka Ayuub; II Korintos 12:7-10).

▣ **“ammaanta Ilaah”** Shuqullada Ciise waxa ay muujiyaan “ammaanta Ilaah.” Eeg tasmada 1:14.

▣ **“in Wiilka Ilaah lagu ammaano”** Weedha lahaanshada ee “ka Ilaah” kuma jirto kuma jirto qoraalladii hore ee Giriigta ee waraaqaha ku qornaa ee P⁴⁵ ama P⁶⁶. Jirradu waxa ay amaan u keenaysaa labadaba Aabbaha iyo Wiilka. Ammaanta ciise ee habkan waa ay ka duwan tahay tii la filayey. Injiilka Yooxanaa gudhiisa ereygu wuxuu tilmaamayey Ciise ku qodbiddiisa iskutallaabta iyo ammaannaantiisa. Dib u soo bogsiinta laasaros waxa ay YUhuudda ku keeni doontaa in dilka Ciise lagu dhawaaqo.

11:5 faallo tafatir ahaaneed oo uu Yooxanaa leeyahay (cf. aayadda. 26).

11:6 “laba maalmood oo kale ayuu meeshuu joogay iska sii joogay” Ciise dib ayuu socdaalkii u dhigay illaa Laasaros ka dhintay! Ciise door gaar ah kama uusan rabin halkan. Waxa ay ahayd ujeeddo Ilaahiyan ah oo ku jirtay jirradan (aayadda. 15; 9:3).

11:7 “Yahuudiya aan haddana tagno” Wada hadlalka socda waxa uu muujinayaa in Yuhuuddu ay rabeen in Ciise dhagxiyaan (cf. aayadda. 8; 8:54; 10:31, 39). Xertu waxa ay muujiyeen isku dhafnaan la yaab leh oo ah rumaysad iyo baqdin wada socota (cf. aayadda. 16). Toomas waxaa had iyo jeer looga fakara in uu ahaa xerow shaki badan, laakiin halkan waxa uu doonayey in uu Ciise la dhinto (aayadda. 16).

Michael Magill, *NT TransLine* (Bogga. 345 #43) waxa uu samaynayaa ukuurgal wanaagsan oo in “aan tagnada” ku jirta aayadda 7 lagu caddaynayo in ay tahay “laakiin Waan tegayaada” ku jirta aayadda. 11. Xertu way cabdanaysay oo shakisanayd, laakiin waa uu isku kalsoonaa. Waa Toomas ka kula xidhmay “aan tagnada” ku jirta aayadda 16!

11:9-10 Kani waa hab cutubkan ku xidhaya cutubka 8:12 iyo 9:4-5 (cf. 12:35). Aayadda 9a waxa ay filaysaa jawaab ah “haa”.

Kani waa farqi waadax ah oo u dhexeeya kuwii raacaya doonista Ilaah (cf. Ciise) iyo kuwii aanan raacayn ee raacaya (cf. aayadda. 10, Yuhuudda). Ciie qalad kuma samaynayo in uu aado meesha Ilaah u hoggaamiyo, maxaa yeelay isagu waa nuurka dunida!

Farqigan u dhexeeya nuurka iyo mugdiga waxa ay ahayd xigmad suugaaneed ay Yuhuuddu leedahayoo ku jira qoraalladii Qurman (i.e., “qardaasyada Wiilasha nuurka oo ay ka soo hor jeedaan Wiilasha mugdiga” ama “Dagaalka Wiilkasha nuurka oo ay ka soo hor jeedaan Wiilasha mugdiga”).

▣ **“Haddii...haddii”** Kuwani labaduba waa jumlado jumlado xaaladeed heerka saddexaad ah oo muujinaya ficil aad muhiim u ah.

11:11 “Saaxiibkeen Laasaros waa hurdaa” Ereyga fal sameeyaha ah ee halkan ku jira waa fal tegay oo aan toosnayn oo wax caddaynaya. Xertu badanaa maysan fahmi jirin Ciise, maxaa yeelay had iyo goor si toos ahyey hadalkiisa u fasiran jiren (cf. aayadda. 13). Ciise adeegsigiisa tilmaantan dhimashada waxa ay ka tarjumaysaa adeegsigii Axdigii Hore (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 31:16; II samuu’eel 7:12; I Boqorrada 1:21; 2:10; 11:21, 43; 14:20, IWM.). Ereyga Ingiriisiga ah ee “cemetery” waxa ku imanayaa isla ereyga xididka ah ee Giriigga ee “asleep” “hurda.”

11:12 “Haddii” Tani waa jumlad xaaladeed heerka koowaad ah oo loo malaynayo in ay tahay mid qoraaga ka timid ama uu ujeedkiisa macna ahaaneed uu u sameeyay.

▣ **“wuu bogsanayaa”** Macnaha tooska ah ee ereygan waa “badbaaday” marka la eego qaab adeegsiga Axdigii Hore “oo ah in si muuqaal ahaan loo keeno” (cf. Yacquub 5:15). Haddaba xertii maysan fahmin ciise oo waxa ay qaateen luuqaddiisii sarbeebta ahayd (sida, waa hurdaa) iyagoo si toos ah u qaatay. Fahan la’aanta ay xertu fahmi waayeen Ciise hadalkiisa waa mid laga dhex garan karo Injiilka Yooxanaa (i.e., aayadaha. 23-24). Isagu kor ayuu ka yimid –iyaguna hoos ayey ka yimaadeen. Caawimaadda Ruuxa la’aanteed (ie. Pentecost), ma ay fahmi karaan!

11:13 Tani waa faallo tafatir oo ka timid Yooxanaa.

11:14 “Ciise haddaba ayaa bayaan ugu yidhi” Ka eeg Mawduuc Gaar ah: *parrhesia* 7:4

11:15 “Anigu waa ku faraxsanahay aawadiin inaanan halkaas joogin si aad u rumaysataan” Ciise waxa uu tilmaamayaa in sarakicinta Laasaros aysan ahayn sabab ka dhalatay xidhiidhkiisa uu Laasaros la leeyahay ama murugada maryan iyo Maarta, laakiin (1) in uu kor u qaado rumaysadka xerta (aayadda. 14) iyo (2) in uu rumaysadka ku dhiirri geliyo dadkii badnaa ee Yuhuudda ahaa labadaba (aayadda. 42). Rumaysadku waa hannaan sida ku jirta Yooxanaa. Mararka qaar waa uu horumaraa (i.e., xertii, cf. 2:11), mararka qaarna ma uu horumaro (i.e., kuwa geeska taagan, cf. 8:31-59).

11:16 aayaddu waxa ay si toos ah u muujinaysaa rumaysadka Tomas. Waxa uu doonayey in uu la dhinto Ciise. Xertu waxa ay doonayeen in la muujiyo ciise oo ka awood batay dhimashada, oo ah cabsida ugu weyn ee aadanha.

Magaca Toomas waxa uu ka tarjumayaa ereyga luuqadda Aramaygga ee “Mataan” (faallo kale oo tafatir ahaaneed), sida Didumos uu ugu jiro afka Giriigga. Injiillada waxa uu ku jiraa taxa rasuullada (cf. Matayos 10:3; markos 3:18; Luukos 6:15); Yooxanaa Injiilkiisu aad ayuu uga hadlaaisaga had iyo goor (cf. 11:16; 14:5; 20:24-29; 21:1). Ka eeg Mawduuc Gaar ah: Diwaanka rasuullada Magacyadooda 1:45.

NASB (UPDATED) TEXT: 11:17-21

¹⁷Haddaba markuu Ciise yimid wuxuu ogaaday inuu afar maalmood xabaasha ku jiray. ¹⁸Haddana Beytaniya waa u dhowayd Yerusaaalem, oo waxay u jirtay qiyaas shan iyo toban istaadiyon. ¹⁹Yuhuud badan waxay u yimaadeen Maarta iyo Maryan inay walaalkood uga tacsiiyeeyaan. ²⁰Maarta haddaba markay maqashay in Ciise imanayo, ayay ka hor tagtay, Maryanse gurigay iska fadhiday. ²¹Markaasaa Maarta waxay Ciise ku tidhi, Sayidow, haddaad halkan joogtid, walaalkay ma uu dhinteen.

11:17 “Haddaba markuu Ciise yimid wuxuu ogaaday inuu afar” Wadaaddadii sharciga Yuhuuddu waxa ay sheegeen in ruuxa aadanuhu uusaddex maalmood la joogay jidhka muddo saddex maalmood ah. Ciise waa uu sugay illaa afar maalmood si loo habsado in Laasaros uu si run ah u dhintay si ka fog rajada ay rabbaaniyiintu qabeen.

11:18 “qiyaas shan iyo toban istaadiyon” aayadda 18 waa faallo tafatir oo ka timid Yooxanaa. Sida tooska ah tani waa “shan iyo toban Furlongs.”

11:19 “Yuhuud badan waxay u yimaadeen Maarta iyo Maryan” inta badan adeegsiga halkan ee ereyga “Yuhuudda,” oo uu had iyo goor Yooxanaa u soo qaato cadawga Ciise waa uu yara dahsoon yahay. Arrintu si kastaba ha ahaatee. Sida macnahan guud ku jirta, waxa uu si sahlan u tilmaamayaa degganayaasha Yerusaaalem kuwaasoo garanayey qoyskan (cf. aayadaha. 31, 33, 45).

11:20 “Maryanse gurigay iska fadhiday” Caadiyan Yuhuuddu waxa ay caado u lahaayeen in ay dhulka fadhiistaan markaay diif ama dacsiiyi jirto.

MAWDUUC GAAR AH: ISUGU IMAADKA BAROORDIIQ

Israa’iiliyiintu waxa ay murugada dhimashada qofka la jecel yahay ku macneyeen in ay tahay tawbadkeen shaqsi ahaaneed, sida dem biyada guud oo kale, weaxayana u muujiyeen dhowr siyaabood

1. In xadhigga korela gooyo, Bilowgii 37:34; 44:13; Xaakinnada 11:35; II samuu’eel 1:11; I Boqorrada 21:27; Ayuub 1:20
2. In ay dhar jawaan ah xidhaan, Bilowgii 37:34; II samuu’eel 3:31; I Boqorrada 21:27; Yeremyaah 48:37
3. In ay kabaha iska bixiyaan, II samuu’eel 15:30; Ishacyaah 20:3
4. In gacmaha madaxa la saarto, II samuu’eel 13:9; Yeremyaah 2:37
5. In dambas madaxa la saarto, Yashuuca 7:6; I Samuu’eel 4:21; Nexemiyaah 9:1
6. In dhulka la fadhiisto, Baroorashadii Yeremyaah 2:10; Yexesqeel 26:16 (in ay dhulka seexdaan, II samuu’eel 12:16); Ishacyaah 47:1
7. In ay naasaha garaacaan, I samuu’eel 25:1; II Samuu’eel 11:26; Naaxuum 2:7
8. In ay jidhkooda jeexaan, Sharciga Ku Noqoshadiisa 14:1; Yeremyaah 16:6; 48:37
9. Soon, II samuu’eel 1:16,22; I Boqorrada 21:27
10. Baroorasho lagu celceliyo, II Samuu’eel 1:17; 3:31; II Taariikhda 35:25
11. Dhukurasho, (timaha oo la iska qaado ama la iska xiiro), Yeremyaah 48:37
12. Gadhka oo la gaabiyo, Yeremyaah 48:37
13. In la daboolo madaxa ama wejiga, II Samuu’eel 15:30; 19:4

11:21, 32 “Markaasaa Maarta waxay Ciise ku tidhi, Sayidow, haddaad halkan joogtid, walaalkay ma uu dhinteen” Tani waa jumlad xaaladeed heerka labaad ah oo loogu yeedho, “la soo hor jeedda xaqiiqada.” Sidaas daraaddeed waxaa loo fahmi karaa, “Haddii aad nala joogi lahaydhalkan, waadan nala joogine, walaakay muusan dhiman lahayn, waaba uu dhintaye.” Maarta iyo maryan hadalladoodii (cf. aayadda. 32) eek u socday Ciise isku mid ayey ahaayeen. Waa in ay horay uga sii wada falanqooden maaddadan intii afartaan maalmood ee maroordiiqda lagu guda jiray. Labadan naagood farxad ayey ka heleen Ciise markii ay ay u caddeeyaan sidii ay ay uga niyad jabsanaayeen in uusan joogin halkan uusan goorta hore iman.

11:22 “Hadda waxaan garanayaa in wax alla waxaad Ilaah weydiisatid uu ku siinayo” ma aha wax si dhab ah loo hubo wixii Maarta ay weyddiinaysay in Ciise uu sameeyo, maxaa yeelay sida ku jirta aayadda. 39 waxa ay layaabtay dib u soo bogsiintii Laasaros.

11:23-24 “Walaalkaa waa sara kici doonaa” Maarta waxa ay lahayd muuqaal fiqi ahaaneed oo nolosha kaddib ah oo la mid ah tii ninkii Yuhuudiga ahayn, ee rumaysadka qaatay xilligii uu jidhku isku tallaabta ku qodbanaa maalintii ugu dambaysay. Waxaa jira caddaymo Qorniinka Axdigii Hore ah oo xadaysan oo ku saabsan aragtidaqn ama taswiirtan (cf. Daanyeel 12:2; Ayuub 14:14; 19:25-27). Ciise waxa uu fahankan Yuhuudda ku weecinayaa ama ku beddelayaa xaqiijinta awooddiisa iyo amarkiisa (cf. aayadda. 14:6).

11:24 “maalinta u dambaysa” in kastoo ay run tahay in Yooxanaa uu caddaynayo dhawaanshaha badbaadada (xukunka maalinta qiyaamaha), wuxuu weli filanayaa waqti wax kasta la dhammayn doono. Tan waxaa loo qeexay dhowr qaab:

1. Xukun ah/ maalinta sarakicidda (cf. 5:28-29; 6:39-40, 44, 54; 11:24; 12:48)
2. “saacad” (cf. 4:23; 5:25, 28; 16:32)
3. Imaanshada labaad ee Masiixa (cf. 14:3; waxaa macquul ah in 14:18-19, 28 iyo 16:16, 22 aya la xidhiidhaan Ciise sarakiciddiisii muuqashada ee aysan ahayn maalinta xukunka ugu dambeeya ee imnaysa)

11:25 “Ciise ayaa ku yidhi, Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha” Tani waxa ay ka mid tahay toddobadii hadal ee Ciise ee ahaa “Anigu waxaan ahay”. Marka la eego wejiga dhimashada Laasaros, maarta waxaa dhiirri geliyey in ay rumaysato in uu noolaan doono. Rajadan waxaa xidid u ah oo ay ku jirta shaqsiga iyo awoodda Aabbaha iyo Ciise (cf. 5:21). Eeg tasmada 8:12

Waxaa la yaab leh qoraalladii hore ee waraaqaha ahaa (i.e., P⁴⁵) iyo qaar Laatiinkii hore ah, qaybihii Syrian, iyo Diatessaron-ku way ka saarayaan ereyada “iyo nolosha.” UBS³ waxa uu ku daristooda ku magacaabayaa “B” isagoo ku xadaynaya, Laakiin UBS⁴ waxa uu ku daristooda siinayaa “A” isagoo ku xadaynaya (xaqiiq).

11:26 “Kii kasta oo nool oo i rumaystaa weligii ma dhiman doono” Waxaa jira qaabab uu qoraalkani u shaqeeyo.

1. Magac u yaalka caalamiga ah ee “dhammaan”
2. Ereyga saddexaad ee falka taagan ah, oo soo bandhigaya baahia loo qabo rumaysadka aan joogsiga lahayn (aayadaha. 25 & 26)
3. Diidmada labada ah ee ku xidhiidhsan dhimashada, “weligii ma dhiman doono, marna ma dhiman doono,” oo aalaaba la xidhiidha dhimashada xagga ruuxa ah.

Injiila Yooxanaa dhexdiisa nolosha weligeed ah waa run haddadan la joogo u ahaanaysa rumaystayaasha, ma aha oo qura dhacdo mustaqbalka dhici doonta. Dantii Laasaros laga lahaa waxa ay tahay in dadka gaadhsiiyo Ciise ereyadiisa! Yooxanaa ahaan, nolosha weligeed ahi waa u run haatan taagan.

11:27 “Haah, Sayidow, waan rumaysnahay inaad tahay Masiixa oo ah Wiilka Ilaah ee dunida iman lahaa” Tan waxaa lagu sheegay fal waqtiyeed kaamilmay. Waa qirahso aad u xooggna oo ku saabsan rumaysadkeeda shaqsi ahaaneed ee ay u qabto Ciise in uu yahay Masiixii la ballan qaaday. Waxa ay fiqi ahaan u dhigantaa qirashadii Butros ee Kaysariya (cf. Matayos 16)

Waxa ay adeegsanaysaa magacyo kala duwan si ay u caddayso rumaysadkeeda.

1. Masiixa (oo laga tarjumay afka Giriigga Masaaya, kii la subkay)
2. Wiilka Ilaah (Magac Axdigii Hore uu Masiixu lahaa)

3. Kii yimaadda (Magac Axdigii Hore ku jira oo ah Kii Ilaah ballan qaaday inuu keeno faraca cusub ee xaqnimada, cf. 6:14)

Yooxanaa waxa uu wada sheekaysiga u adeegsadaa in uu runta ku gudbiyo. Waxaa jira dhowr qirashooyin oo ku saabsan rumaysashada Ciise oo ku jira Injiilka Yooxanaa (cf. 1:29, 34, 41, 49; 4:42; 6:44, 69; 9:35-38; 11:27). Ka eeg Mawduuc Gaar ah: Yooanaa adeegsigiisa iimaanka ama rumaysadka 2:23.

NASB (UPDATED) TEXT: 11:28-29

²⁸Markay taas tidhi, way tagtay oo hoos ahaan ugu soo yeedhay walaasheed Maryan, oo waxay ku tidhi, Macallinkii halkan buu joogaa, waana kuu yeedhayaa. ²⁹Iyaduna kolkay maqashay, dhaqso bay u kacday oo u tagtay.

11:28 “Macallinkii” Kitaabka Barashada baybalka ee NASB (bogga. 1540), waxaa ku jirta faallo weyn, “qeexitaan muhiim ah oo ay naagi bixisay. Rabbaaniyiintu waxba dumar maysan bareen (cf. 4:27), laakiin Ciise si dhaqsiyo leh ayuu wax u baray.”

MAWDUUC GAAR AH: DUMARKA KU JIRA KITAABKA QUDDUUSKA AH

I. Axdigii Hore

A. Dhaqan ahaan waxaa dumarka loo haystay sidii hanta oo kale

1. Waxay ku jireen liiska hantida (Baxniintii 20:17)
2. La macaamilkii haweenka addoonta ah (Baxniintii 21:7-11)
3. Ballammada haweenka oo ay raga masuuliyiinta ahi joojin karaan (Tirintii 30)
4. Haweenka oo loo arko in ay yihiin kuwa dagaalka huriya ama sii shida (Sharciga Ku Noqoshadiisa 20:10-14; 21:10-14)

B. Waxa si la taaban karo u jiray xidhiidh labo dhinacle ah

1. Rag iyo dumar waxaa laga abuuray ekaanta Ilaah (Bilowgii 1:26-27)
2. Maamuus aabbaha iyo hooyada (Baxniintii 20:12 [Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:16])
3. Xushmee hooyada iyo aabbaha (Laawiyiintii 19:3; 20:9)
4. Raga iyo dumarku waxa ay noqon lahaayeen Nadiirka (Tirintii 6:1-2)
5. Gabdhaha la dhalay waxa ay xaq u leeyihiin dhaxalka (Tirintii 27:1-11)
6. Qayb ka mid ah dadkii Axdiga (Sharciga Ku Noqoshadiisa 29:10-12)
7. U kuur galka wax baridda aabbaha iyo hooyada (Maahmaahyadii 1:8; 6:20)
8. Wiilasha iyo gabdhaha Xeamam (qoys reer Laawi ah) oo muusikada Macbudka hoggaaminayey (I Taariikhdiisii 25:5-6)
9. Wiilasha iyo gabdhuhu wax bay sii sheegi doonaan jiilka cusub dhexdiisa (Yoo'eel 2:28-29)

C. Haweenku doorar ayey ku lahaayeen hoggaanka

1. Muuse walaashii Maryama, oo loogu yeedhay in ay tahay nebiyad (Baxniintii 15:20-21 sidoo kale ogsoonow Miikaah 6:4)
2. Haweeney Ilaah hibo u siiyey in alaabada u tidicdo teendhada (Baxniintii 35:25-26)
3. Naagtii, la odhan jiray Dibooraah, oo sidoo kale ahayd nebiyad (cf. Xaakinnada 4:4-5; 5:7)
4. Xuldaah waxa ay ahayd nebiyad uu Boqor Casaayaah ku soo rogay in ay aqriso oo ay tarjunto “buuggii sharciga” ee cusbaa ee la helay (II Boqorrada 22:14; II Taariikhda 34:22-27)
5. Boqoraddii Ester ee ahayd haweeney Ilaah aaminsan, oo badbaadisay Yuhuuddii Beershiya joogtay

II. Axdiga Cusub

A. Xilligii dunidii Yahuudiya iyo Roomankii Yeriixoo dhaqan ahaan dumarkii joogay waxa ay ahaayeen ilbixiin heer la labaad taagan kuwaasoo lahaa xoogaa xuquuqo iyo muhiimado ah (tan ka baxsan waxa ay ahayd makedooniya).

B. Haweenii ku jiray doorarkii hoggaaminta

1. Elisabed, iyo Maryan, oo ahaa dumar Ilaah raalli ka ahaa (Luukos 1-2)

2. Aana, haweeney Ilaah aaminsan , oo macbudka ka shaqan jirtay (Luukos 2:36)
3. Ludiya, rumayste iyo hoggaamiye kaniisad guri (Falimaha Rasuullada 16:14,40)
4. Filibos afartiisii gabdhood ee bigradaha ahaa waxa ay ahaayeen nebiyado (Falimaha Rasuullada 21:8-9)
5. Foybi, oo ah wadaad u adeegta kaniisaddii ku tiil Kenekhrey (Rooma 16:1)
6. Bariska (Bariskilla) waday Bawlos la shaqaynaysa iyo macallimaddii Aboolos (Falimaha Rasuullada 18:26; Rooma 16:3)
7. Maryan, Turufayna, Turufoosa, Bersis, Yulya, Neere'us walaashiis, waa dhowr dumar ah oo la shaqaynayey Bawlos (Rooma 16:6-16)
8. Yuniyas (KJV), waxaa macquul ah in rasuulad tahay (Rooma 16:7)
9. Yu'odiya Suntutkee, kuwo rasuul Bawlos la shaqayn jiray (Filiboy 4:2-3)

III. Sidee buu rumayste casrigan joogaa u isugu qiyaasi tusaalooyinka kala duwan ee Baybalka?

- A. Sidee buu qof go'aan uga gaadhi karaa run taariikh ama dhaqan ku aaddan, oo tilmaamaysa oo qura macnaha dulucda asalka ah, oo ka timid runta weligeed ah ee kaniisadaha iyo rumaystayaasha oo dhan fac kasta oo ay ahaayeen ansax u ah?
 1. Waa in aan si ku taloggal leh u qaadanaa qoraagii asal ahaan loo waxyooday weliba si dhab ah. Kitaabka Qudduuska ahu waa Ereyga Ilaah waana isha keliya ee laga helo rumaysad iyo wax qabashada ficilka ah.
 2. Waa in aan si cad u qaadanaa xaaladdii taariikha ahaan qoraalka loo waxyooday
 - a. Caadooyinkii Reer Israa'iil (Falimaha Rasuullada 15; Galatiya 3)
 - b. Habkii Yuhuudda ee qarnigii koowaad
 - c. Bawlos hadalladiisii sida cad ee taariikhiga uahaa sida ku jirta I Korintos
 - (1) Habka caadiga ah ee diinlaawayaashii Rooma (I Korintos 6)
 - (2) Kuwii addinsiga ku sii hadhay (I Korintos 7:20-14)
 - (3) Celibacy (I Korintos 7:1-25)
 - (4) Bikrooyinkii (I Korintos 7:36-38)
 - (5) Cunnadii loo bixiyey sanamka (I Korintos 8; 10:23-33)
 - (6) Ficillada aan ku habboonayn Cashada Rabbiga (I Korintos 11)
 3. Ilaah si cad oo buuxda ayuu isugu muujiyey dhaqan gaar ah maalin gaar ah. Waa in aan si dhab u qaadanaa muujinta, laakiin ma aha qaab kasta oo ay taariikhda ugu jirto. Ereyga Ilaah waxaa loo adeegsaday oo lagu qoray ereyo aadane, oo lagu hagaajiyey dhaqan gaar ah iyo saacad gaar ah.
- B. Tarjumaadda Baybalka waa in lagu raadiyaa ku talogalkii qoraaga ee asalka ahaa. Muxuu maalintiisaas sheegayey? Tani waxa ay aasaas ahaan iyo muhiimadahaan u leedahay tafsiirka gaar ah. Laakiin intaas dabadeed waa in aan middan ku dhaqan gelinaa waqtigeennan aan joogno. Hadda, halkan waxaa ah in haweenku ka qayb qaataan hoggaaminta (dhibaataada runta ee tafsiirku waxa uu noqon karaa sida loo qeexayo ereyga. Miyey jiraan adeegyo ka badan kuwa wadaaddada kaniisadda kuwaasoo loo arkay sidii hoggaamin? Miyaa adeegtooyinkii iyo nebiyadihii loo arkay sidii hoggaamiyeyaal? Waa xigasho cad in sida ku jirta I Korintos 14:34-35 iyo I Timoteyos 2:9-15, ay tahay timaal uu Bawlos ku sheegayo in haweenku ayan hoggaan ka noqon caabidaadda! Laakiin sideebaan taas u dhaqan gelin karaa maanta? Ma doonayo in dhaqankii Bawlos ama dhaqankaygu ay aammusiyaan Ilaah Ereygiisa iyo doonistiisa. Arrinta macquulka ahi waxaa weeye in xilligii bawlos aad u xadaysnaayeen, maalintaydan aad ayey y furan tahay. Raaxo darro ka dareemayaa in aan idhaahdo ereyadii iyo wax baridyadii Bawlos waa xaalad, qarnigii koowaad deegaanka ka jirta oo shuruud ahayd. Kumaan ahay marka aan maankayga iyo dhaqankayga u diido wixii qoraa loo waxyooda?!

Arrintu si kastaba ha ahaatee, maxaan sameeyaa marka ay jiraan tusaalooyin baybalka ah oo ku saabsan haween hoggaamiyeyaal ah (xitaa qoraallada Bawlos dhexdooda, cf. Rooma 16)? Tusaale wanaagsan waxaa ah falanqaynta Bawlos ee ku aaddan caabudaadda dadweynaha sida ku jirta I Korintos 11-14. Sida ku jirta 11:5 waxa ay u muuqataa in uu oggol yahay in haweenka wacdigooda iyo salaaddooda dadka dhexdiisa iyagoo madaxoodu uu daboolan yahay, welise sida ku jirta 14:34-35 waxa uu ka dalbanayaan in ay aammusnaan ku joogaan! Waxaa jiray adeegtooyin (cf. Rooma 16:1) iyo nebiyado (cf. Falimaha Rasuullada 21:9). Tan ayaa ah kala

duwanaashaha ii oggolaanaya xorriyadda aan ku caddaynayo ama ku muujinayo faalladii Bawlos (ee la xidhiidha xaddidaadda haweenka) si loogu xadeeyo sidii qarnigii koowaad ee Korintos iyo Efesos. Labada kaniisadoodba waxaa ka jiray dhibaatooyin ah sidii ay haweenku xorriyaddoodan cusub ee ay heleen ficil ahaanta ugu adeegsanayeen (cf. Bruce Winter, *After Paul Left Corinth*), kaasoo ku keenay culays kaniisaddu in ay dadkeeda ku gaadho Masiixa. Waxa ay ahayd in xorriyaddooda la xaddido si uu Injiilku u noqdo mid saamayn badan leh.

Maalintaydu markan waa ay ka soo hor jeeddaa tii Bawlos. Maalintaydan dhexdeeda, injiilka ayaa mid xadaysan ahaanaya haddii lagu soo daro, haweenka tababbaran looma oggola in ay injiilka dadka la wadaagaan, oo looma oggola in ay wax hoggaamiyaan. Haddaba, haddii ay sidaas tahay, muxuu noqonayaa yoolka ugu dambeeya ee sida ay dadku Ilaah u caabudayaan? Miyeyaan ahayn wacdin iyo xerkadhigid? Miyaa Ilaah lagu maamuusi karaa oo looga farxin hoggaamiyeyaal dumar ah? Baybalka guud ahaan waxa uu u muqdaa in uu leeyahay “haal”!

Waxaan doonayaa in aan ka midho dhaliyo qoraalka Bawlos. Aniga fiqigaygu waa kii Bawlos. Ma doonayo in si aadah ay ii saameeyaan ama qasab wax iigu qasbaan qaabkan casriga ah ee haweenka! Arrintu si kastaba haahaatee, waxaa an dareemayaa in kaniisaddu ay aad uga gaabisay in ay ku jawaabto runta cad ee Baybalka, sida addoonsiga aan ku habboonayn, cunsuriyadda, eexda, jinsi raaca. Waxaa sidoo kale laga gaabiyey in si ku habboon looga jawaabo cayda ama gefka haweenka loo gaysanayo waqtigan asriga ah. Ilaah oo Masiixa ku jira ayaa xoreeyay addoonkii iyo haweenkii. Ma oggolaanayo in dhaqanku uu xidhxidho qoraalka.

Hal tilaan oo dheeraad ah: Tafsiire ahaan waxaan ogsoonahay Korintos ay ahayd kaniisad uu aad rabash uga dhex jiro. Hadiyadihii ayaa qiimo lagu qaatay oo dibadda la soo dhigtay. Waxaa dhacda in dumarka sidan awgeed loo qabtay. Waxaa sidoo kale rumaysnahay in macallimiin been ahi ay waxyeello u geysteen kaniisadd Efesos kuwaasoo qaadanayey faa'idada haweenka oo gashanayey booska kuwa hadlaya guryaha kaniisadaha ah ee Efesos dhexdooda.

C. Soo jeedinno ku saabsan akhrin dheeraad ah

How to Read the Bible for All Its Worth oo ay qoreen Gordon Fee iyo Doug Stuart (bogagga 61-77)

Gospel and Spirit: Issues in New Testament Hermeneutics oo uu qoray Gordon Fee

Hard Saying of the Bible oo ay qoreen Walter C. Kaiser, Peter H. Davids, F. F. Bruce, iyo Manfred T. Branch (bogagga 613-616; 665-667)

NASB (UPDATED) TEXT: 11:30-37

³⁰Ciise weli ma iman tuulada, laakiin wuxuu weli joogay meeshii Maarta kaga hor tagtay. ³¹Haddaba Yuhuuddii iyada guriga la joogtay oo u tacsiiyaynaysay, markay arkeen Maryan inay dhaqso u kacday oo baxday, ayay raaceen, iyagoo u malaynaya inay xabaashii tegayso inay meeshaas ku baroorato. ³²Haddaba Maryan markay timid meeshii Ciise joogay oo ay aragtay isaga, waxay ku dhacday caghiisa iyadoo ku leh, Sayidow, haddaad halkan joogtid, walaalkay ma uu dhinteen. ³³Ciise haddaba markuu arkay iyadoo barooranaysa, iyo Yuhuuddii la socotay oo la barooranaysa, ayuu ka qalbi xumaaday, wuuna murugooday. ³⁴Markaasuu yidhi, Xagee baad dhigteen? Waxay ku yidhaahdeen, Sayidow, kaalay oo arag. ³⁵Ciise waa ooyay. ³⁶Sidaa daraaddeed Yuhuuddu waxay yidhaahdeen, Bal eega, siduu u jeclaa. ³⁷Qaarkoodse waxay yidhaahdeen, Ninkan oo indhaha u furay kii indha la'aa, miyuusan wax ka samayn karin inuusan ninkaasu dhiman?

11:30 Kani waa faahfaahin marqaati fur kale oo ee qoraaga rasuulka ah.

11:33

NASB

“Si qoto dheer ayuu uga qalbi xumaaday oo uga murugooday”

NKJV

“wuu ka qalbi xumaaday wuuna murugooday”

NRSV

“si weyn ayuu ruux ahaan u qasmay wuuna murugooday”

TEV

“qalbigiia ayaa la taabtay oo si qoto dheer ayuu mu murugooday”

NJB “Si weyn ayaa Ciise loo qalbi xumeeyay wuuna murugooday”

Middani macne ahaan waa “snotred in the spirit.” Hadalkan sarbeebta ah waxaa laalaa loo adeegsan jiray cadhada (cf. Daanyeel 11:30 [LXX]; Markos 1:43; 14:5). Laakiin marka dulucda macnaha guud la eego tarjumaadda muujinaysa dareenka weyn waa in la door bido (cf. aayadda. 38). In kastoo mufasiriinta qaarkood ay u arkaan dareen dheeraad ah, caqli gal ahaan cadho, dhimasho hor seedaysa, Ciise waxa uu run ahaantii lahaa dareenno aadane (cf. aayadaha. 33, 35, 36, 38) oo wuxuu iyaga halkan ku tusayaa saaxiibbadiis.

11:35 “Ciise waa ooyay” Tani waa aayadda ugu gaaban Baybalka. Dhimashadu ma ahayn doonista Ilaah ee meerahan dushiisa. Waa natiijo ka timid fallaagonimada aadanaha. Ciise waxa uu dareemayaa halaagga ku dhacay kuwii la jeclaa. Waxa uu dareenayaa noloshii uu la soo maray raacayaashiisa oo dhan!

Ciise oohintiisu waxa ay ahayd mid deggan oo naxariis shaqsi ahaaneed leh, balse maysan ahayn laakiin maahayn baroorashadii lagu soo sheegay aayadda.33.

11:37 Su’aashani wax ay filaysaa in ay hesho jawaabta “haa”. Tani waxa ay ahayd fikirkii Maarta ee ku jira aayadda. 21 iyo tii Maryan kii Maryan eek u jira aayadda. 32.

NASB (UPDATED) TEXT: 11:38-44

³⁸Sidaa daraaddeed Ciise oo mar kale qalbi xumaaday ayaa xabaashii yimid. Waxay ahayd god, dhagax baana saarna. ³⁹Ciise ayaa yidhi, Dhagaxa ka qaada. Maarta oo ahayd kii dhintay walaashii, waxay ku tidhi, Sayidow, hadda wuu urayaa, waayo, afar maalmood buu mootanaa. ⁴⁰Ciise wuxuu ku yidhi, miyaanan kugu odhan, Haddaad rumaysatid, waxaad arki lahayd ammaanta Ilaah? ⁴¹Markaasay dhagaxii ka qaadeen. Ciisena indhihiisuu kor u taagay oo yidhi, Aabbow, waan kuugu mahad naqayaa inaad i maqashay. ⁴²Waana ogaa inaad mar kasta i maqasho, laakiin dadkan badan oo hareerahayga taagan aawadood ayaan taas u idhi inay rumaystaan inaad adigu i soo dirtay. ⁴³Markuu sidaas ku hadlay dabadeed wuxuu ku dhawaaqay cod weyn, Laasarosow, soo bax. ⁴⁴Markaasaa kii dhintay soo baxay, isagoo gacmaha iyo cagaha ay kafan kaga xidhan tahay, wejigana maro kaga xidhan tahay. Kolkaasuu Ciise wuxuu ku yidhi iyaga, Fura oo daaya, ha socdec.

11:38 “Xabaal” Markii xiisaddan lagu guda jiray Falastiin dhexdeeda xabaashu waxa ay ahayd mid uun

1. Godad dabiici ah (*Bara Bathra* 6:8)
2. Godad la qoday oo la kala googooyey oo dhagxan wareegsan lagu kala gooyey kuwaasoo qoyan
3. God dhulka laga qoday oo dabadeed dhagxaan ballaadhan lagu daboolay

Daraasad ay aakiyoolijiiystayaashu ka sameeyeen Yerusaleem aragtida #1 ayaa tan ugu fiican noqotay.

11:39 “Dhagaxa ka qaada” dhagax weyn oo dusha laga saaro ayaa ahaa qodobka xabaasha looga ilaaliyo tuugada iyo xayawaanka.

▣ **“afar maalmood buu mootanaa”** Kani waa hadal sarbeebed afka Giriigga ah, oo macnaha tooska ah noqonaya “ninkii afarta maalmood.”

11:40 “Haddaad” Tani waa jumlad xaaladeed heerka saddexaad ah oo macnaheedu yahay ficilku waa macquul. Aayaddu waa su’aal filaysa “haa” jawaab ah.

▣ **“ammaanta Ilaah”** Ammaanta Ilaah waxaa lagu muujiyey falimihii Ciise (cf. aayadda. 4). Ka eeg tusmo buuxda 1:14.

11:41 “Ciisena indhihiisuu kor u taagay” Qaabka baryada ama salaadda Yuhuuddu waxa ay ahayd in ay gacmaha iyo indhaha oo furan ay samada u taagaan. Kani waa hadal sarbeebed ku aaddan salaadda (cf. 17:1).

▣ **“inaad i maqashay”** Ciise waa uu “maqlaa” Aabbaha (cf. 8:20, 40; 15:15) Aabbuhuna waa “maqlaa” Isaga. Kuwaa “maqla” Ciise nolosha weligeed ah ayey leeyihiin. Kani waa hadal socda oo ah “arkid” iyo “maqlid” oo la siman in la “qaato” (1:12) iyo in la “rumeeyo” (3:16). Laasaros waxa uu “maqlay” codkii Ciise oo noloshii ayuu dib ugu soo laabtay.

11:42 Tani waxa ay caddaynayaa ujeedkii baryadii Ciise iyo mucjisadii. Ciise had iyo jeer mucjiso ayuu samaynayey si uu u dhiirri geliyo rumaysadka xerta, oo sababtan awgeed uu rumaysad ku bilowdo Yuhuuddii ka timid Yerusaaalem.

Fiqi ahaan Ciise waxa uu mar kale sarraysiinayaa amarka Aabbaha iyo mudnaanta gaarka ah ee shuqulladiisa ku jirta (cf. 5:19, 30; 8:28; 12:49; 14:10). Mucjisadani waxa ay muujinaysaa xidhiidhka ku dhow ee uu ciise la leeyahay Aabbaha. Ka eeg Mawduuc Gaar ah: Diris (*Apostello*)5:24.

11:43 “wuxuu ku dhawaaqay cod weyn, Laasarosow, soo bax” Waxaa la sheegay in haddii Ciise uusan Laasaros magaciisa ugu yeedhi lahayn ay kwa qabiyada ku jira oo dhan ay soo wada bixi lahaayeen!

11:44 waxaa maydadka la duugaa iyagoo biyo lagu mayray, dabadeed lagu duudduubay maryo cadad ah oo dhirta wax carfisa look ala dhex mariyey si ay u caawiyaan xagga urka. Waxay ahayd in maydka la duugo illaa muddo afar iyo labaan saacadood ah maxaa yeelay Yuhuuddu maysan eedayn karin kooda dhintay.

MAWDUUC GAAR AH: QAABABKII AASKA

I. Mesabotaamiya

- A. Xabaal gaar ah ayaa loogu baahnaa farxadda nolosha kaddib.
- B. Tusaale ku saabsan inkaarta reer Mesabotaamiya waa, “dhulku jidhkaaga ma haleelo.”

II. Axdigii Hore

- A. Xabaal gaar ah aad ayey muhiim u ahayd (cf. Wacdiyaha 6:3).
- B. Si dhaqo leh ayaa loo samayn jiray (cf. Sarah-da ku jirta Bilowgii 23 iyo Raaxeel-sha ku jirta Bilowgii 35:19 oo ogsoonow Sharciga Ku Noqoshadiisa 21:23).
- C. Xabaal aan caadi ahayn waxa ay ahayd calaamad diidmo iyo dembi.
 - 1. Sharciga Ku Noqoshadiisa 28:26
 - 2. Ishacyaah 14:20
 - 3. Yeremyaah 8:2; 22:19
- D. Haddii ay macquul tahay waxaa xabaasha laga dhex samayn jiray booska qoyska dhexdiisa.
- E. Ma jirin waxa eedayn ah, sidii Masar oo kale. Aadanuhu boodh ayuu ka yimid waana in uu boodh u laabtaa (tusaale ahaan. Bilowgii 3:19; sabuurrada 103:14’ 104:29).
- F. Xagga Yuhuuddii sharciga way adkayd in la qiyaasto maammuus gaar ah iyo in maydka loo sameeyo aas ku habboon.

III. Axdiga Cusub

- A. Xabaasha oo horay si dhaso leh loo diyaariyo, sida badan afar iyo labaan saacadood. Badanaa Yuhuuddu saddex maalmood ayey qabriga daawan jireen, iyagoo rumaysan in naftu ay jidhka ku soo noqon lahayd isla waqtigaas (cf. Yooxanaa 11:39).
- B. Aaska oo uu la socdo in maydka la nadiifiyo oo lagu duudduubo maryo dhir udug leh la mariyey (Yooxanaa 11:44; 19:39-40).
- C. Ma jirin xeerar ama qodobbo u gooni ahaa aaska Yuhuudda iyo Masiixiyiinta ama sheyo xabaasha lala gelinayo qarnigii koowaad ee falastiin.

NASB (UPDATED) TEXT: 11:45-46

⁴⁵Sidaa aawadeed qaar badan oo Yuhuuddii ah oo Maryan u yimid oo arkay wuxuu sameeyey ayaa rumaystay. ⁴⁶Qaarkoodse way u tageen Farrisiintii, oo waxay u sheegeen wuxuu Ciise sameeyey.

11:45 “Sidaa aawadeed qaar badan oo Yuhuuddii ah. . ayaa rumaystay” Kani wa muuqaalka lagu qeexay Injiilka (cf. 20:30-31). Weedhani waxa ay noqonaysaa saambal ma kaamiyoone (cf. 2:23; 7:31; 8:30; 10:42; 11:45; 12:11, 42). Arrintu si kastaba ha ahaatee, waa in dib loo caddeeyaa in rumaysadka ku jira Injiilka

Yooxanaa uu dhowr heer ama darajo leeyahay oo uusan had iyo goor ahayn rumaysad badbaado leh (cf. 2:23-25; 8:30ff). Ka eeg Mawduuc Gaar ah: 2:23.

11:46 “Qaarkoodse way u tageen Farrisiintii, oo waxay u sheegeen wuxuu Ciise sameeyey” Waa wax la yaab leh heerka indhola’aanta ee wejiga arkay waxbariddan iyo mucjisadan aan la qiyaasi karin. Si kasta ha ahaatee, Ciise waa uu kala qaybinayaa kooxaha u yimaada in ay Isaga aamminaan oo dhan iyo kuwaa diida runta Ku saabsan Isaga. Xitaa mucjiso awood badan sida middan oo kale ma keeni karto rumaysad (cf. Luukos 16:30-31).

NASB (UPDATED) TEXT: 11:47-53

⁴⁷Sidaa aawadeed wadaaddadii sare iyo Farrisiintii shir bay isugu yimaadeen oo yidhaahdeen, Maxaynu samaynaa, waayo, ninkanu calaamooyin badan buu sameeyeye. ⁴⁸Haddaynu sidaa u dayno, dhammaan way rumaysan doonaan isaga, oo dadka Roomana way iman doonaan, oo waxay qaadan doonaan meesheenna iyo quruunteenna. ⁴⁹Midkood Kayafas la odhan jiray, oo wadaadka sare ahaa sannaddaas, wuxuu iyagii ku yidhi, Waxba garan maysaan, ⁵⁰oo ka fiirsan maysaan inay idiin roon tahay in nin keli ahu dadka u dhinto oo aan quruunta oo dhammu lumin. ⁵¹Waxaas iskama odhan, laakiin isagoo ah wadaadka sare sannaddaas, wuxuu sii sheegay in Ciise quruunta u dhiman doono, ⁵²quruuntii oo keliya uma aha, laakiin inuu mid keliya isugu soo ururiyo carruurtii Ilaah oo kala fridhsan ⁵³Haddaba maalintaas wixii ka dambeeyey waxay ku tashadeen inay dilaan.

11:47 “Sidaa aawadeed wadaaddadii sare iyo Farrisiintii shir bay isugu yimaadeen oo yidhaahdeen” Tani waxa ay la xidhiidhaa maxkamaddii sare ee Saherdin ee Yuhuudda eek u tiil Yeruusaalem. Waxa ay lahayd 70 xubno degaameed. Wadaaddadu waxa ay ahaayeen kuwa siyaasadda oo magacooda loo yiqiin Sudukiin, kuwaasoo aqbalay qoraalladii Muuse oo qura diidayna sarakiciddii. Kuwii aan Yuhuudda ahayn waxa ay ahaayeen kuwo aad caan u ah, ooah koox caddaaladda diinta ku adag oo ku xooggan (1) Axdigii Hore oo dhan; (2) adeegga malaa’igaha; (3) nolosha dambe. Waa wax la yaab leh in labadan kooxood ee cadawga ah ay isugu xidhmeen hal ujeed. Ka eeg Mawduuc Gaar ah: Kuwa aan Yuhuudda ahayn 1:24. Ka eeg Mawduuc Gaar ah: Sanherdin 3:1.

☐ **“ninkanu calaamooyin badan buu sameeyeye”** Tixraacan ku saabsan Ciise ee “ninkan” waa hab aflagaaddo ah oo la diidayo in aan lagu muujin magaciisa. Waxaa sidoo kal yaab leh, xaadir ahaanshaha mucjiso sidan u weyn sida, sarakicintii Laasaros, laga arkayo in eexdoodii ay horay u sii qiyaasteen ay gebi ahaanba indho tirtay (cf. II Korintos 4:4).

11:48 “Haddii” Tani waa jumlad xaaladeed heerka saddexaad ah, oo macnaheedu yahay ficil muhiim ah.

☐ **“dhammaan way rumaysan doonaan isaga”** Masayrka iyo is waafaq la’aantooda fiqi ahaaneed ayaa ahayd halka ay aamminis la’aanta iyo cabsida Ciise ay uga timid. Ereyga “dhammaan” waxa uu la xidhiidhaa reer Samaariya iyo kuwa aam Yuhuudda ahayn (cf. 10:16). Sidoo kale waxaa jirtay ujeed siyaasadeed oo ku aaddanaa cabsidooda (tusaale ahaan, Maammulkii Roomaanka).

☐ **“Roomana way iman doonaan, oo waxay qaadan doonaan meesheenna iyo quruunteenna.”** Tani waxa ay ka mid tahay wax sii sheegid yada adadag ee ku jira Injiilka Yooxanaa, taasoo uu janaraal reer Rooma ah ka dhex oofiyey boqortooyada dhexdeeda A. D. oo ah tii taas ka dambaysay, Titus.

Siyaasadda runta ah ee maamulkii Rooma waxay ahayd qayb lagamaq maarmaan u ah dhammaadka waqtiga Yuhuudda (xukunka ugu dambeeya) rajo ah. Waxa ay rumaysnaayeen in Ilaah soo diri doono askar doomeed xoog badan, sida Xaakinnadii Axdigii Hore, kuwaasoo jidh ahaan la soo kaxayn lahaa Roomaanka. Dhowr Masiixa iska dhegdhigaya ayaa waxa ay fallaagonimo ka bilaabeen Falastiin gudaheeda si ay isugu dyaaan in ay kaamilaan filashadan.

Ciise waxa uu ku dooday in boqortooyadiisu aanay ahayn mid kumeelgaadh ah ama awood siyaasadeed (cf. 18:36), laakiin awood ruuxi ah oo caalamka lagu so oaf jari doono mustaqbalka (i.e., Muujintii). Wuxuu ku dooday in uu kaamili doono wax sii sheegidyadii Axdigii Hore, laakiin dhabetu ma aha, Yuhuud, ama qaab quruun ahaaneed. Tan awgeed ayaa Yuhuud badan oo xilligiisii joogtay u diideen isaga.

11:49 “Midkood Kayafas la odhan jiray, oo wadaadka sare ahaa sannaddaa” booska wadaad sare nimadu waxa uu ahaa boos aad u cimri dheer oo wadaadka sare carruutiisa u sii gudbaya (cf. Baxniintii 28), laakiin markii Roomanku awoodda waxa yeesheen, waxaa lagu iibiyey qiimaha ugu sarreeya ganacsigii faa’idada badnaa awgii ee laga heli karay Buur saytuun iyo agagaarka macbudka. Kayafas waxa uu wadaad sare ahaa A. D. 18-36 (siddoggii Annas, Wadaadkii Sare ee A. D. 6-15).

11:50-52 Kani waa tusaale kale oo ku aaddan hadallada adadga ee uu Yooxanaa adeegsanayo. Kayafas oo Injiilka wacdinaya!

11:50 “in nin keli ahu dadka u dhinto” Marka la tix raaco Axdigii Hore ee middan waa Yuhuudda aragtidoonii ahayn “darajaynta.” Hal qof (ha wanaagsanaado ama ha xumaado) ayey ahayn in uu saamayn ku yeesho dadka oo dhan (i.e., Aadan/ Xaawa; Achan). Ujeedkan ayaa waxa uu keenay in la fahmo qabka allabariga qurbaankaah, gaar ahaan Maalinta Kafaaragudka (Laawiyaantii), halkaasoo neef aan iin lahayn uu u dhiman jiray beddelka dembigii quruunta. Tani waxa ay noqotay ujeeddadii Masiixa eek u jirtay Ishacyaah 53. Haddii aad eegto Axdiga Cusub ee Aadan/Masiixa sia ku jirta Rooma 5:12-21 ujeedkan ayaa ka soo baxaya.

11:51

NASB, REV,

NET

NKJV, NIV,

REB

NRSV

NJB

“In Ciise damacsanaa in uu dhinto”

“in Ciise uu dhimanayey”

“in Ciise u dhawaa in uu dhinto”

“Taaso ahayd in Ciise dhinto”

NIDOTTE, qaybta 1, bogga 326, waxaa ku qoran faallo wanaagsan oo ku saabsan adeegsiga fiqi ahaneed ee ereyga *mello* (“waa waajib, ” “waa in uu” ama “in uu, ” si ay xaqiiq u noqdaan”) markaasoo loo isticmaalay Doonista Ilaah ee Ciise shaqadiisii madaxfurashada.

1. Markos 10:32
2. Matayos 17:22
3. Luukos 9:31, 44; 24:21; Falimaha Rasuullada 26:23
4. Yooxanaa 7:39; 11:51; 12:33; 14:22; 18:32

Waxa sidoo kale loo adeegsaday lagama maarmaanimada Yuudas gacangelintiisii

1. Luukos 22:23
2. Yooxanaa 6:71; 12:4

Luukos, sida ku jirta Falimaha Rasuullada, waxa uu u adeegsanayaa sidii wax kaamilid nebi (i.e., Falimaha Rasuullada 11:28; 24:15; 26:22). Dhacdooyinkii madaxfurashada oo dhammi waxa ay ku jireen Gacmaha Ilaah (cf. Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28; 13:29)!

11:52 “inuu mid keliya isugu soo ururiyo carruurtii Ilaah oo kala firidhsan” Tani waxa ay u muuqataa in ay tahay faallo tafatir ahaaneed oo Yooxanaa leeyahay oo la siman 10:16. Waxa ay tilmaami kartaa

1. Yuhuudda ku dibadda Falastiin
2. Yuhuuda badhkeed sida kuwa reer Samaariya
3. Kuwii aan Yuhuudda ahayn

Talada #3 ayaa u muuqata tan ugu wada fiican. Mid kastoo ay ahaataba, dhimashada Ciise waxa ay keeni doontay midnimo dhex marta aadanaha rumaysadka leh (cf. 1:29; 3:16; 4:42; 10:16).

11:53 “Haddaba maalintaas wixii ka dambeeyey waxay ku tashadeen inay dilaan” Tani waa taswiir soo noqnoqnaysa oo ku jirta Yooxanaa (cf. 5:18; 7:19; 8:59; 10:39; 11:8).

NASB (UPDATED) TEXT: 11:54

⁵⁴Sidaa daraaddeed mar dambe Ciise bayaan uma dhex marin Yuhuudda, wuuse ka tegey meeshaas, ilaa meel u dhowayd cidlada, ilaa magaalo la yidhaahdo Efrayim, halkaasuuna xertii la joogay.

11:54 “Sidaa daraaddeed mar dambe Ciise bayaan uma dhex marin Yuhuudda” Yooxanaa 12 waa Ciise iskudaygiisii ugu dambeeyay ee uu kula macaamilayey hoggaamiyeyaashii diinta.

Ereyga ku dhex tarjuman Yooxanaa ee “si bayaab ah” (cf. 7:26; 11:54; 18:20) had iyo goor macnihiisu waa “waadax ah ama loo wada jeedo.” Ka eeg Mawduuc Gaar ah: 7:4

▣ **“ilaa magaalo la yidhaahdo Efrayim”** Magaaladan waxaa laga yaabaain ay ku taal meel ku dhow Baytel oo Samaariya dhexdeeda ah (cf. II taariikhdii 13:19).

NASB (UPDATED) TEXT: 11:55-57

⁵⁵Hadda lidda Yuhuudda ee Kormaridda la yidhaahdaa waa dhowayd, kuwa badanna waxay u kaceen Yerusaaalem iyagoo dalka ka yimid Iiddii Kormaridda horteed inay isdaahiriyaan. ⁵⁶Sidaa daraaddeed ayay Ciise doondooneen, oo waxay isku yidhaahdeen, iyagoo macbudka dhex taagan, Maxay idinla tahay? Ma inuusan iidda imanaynin baa? ⁵⁷Wadaaddadii sare iyo Farrisiintii waxay amar ku bixiyeen, Hadduu qof ogaado meeshuu joogo waa inuu sheego, ha la qabtee.

11:55-57 Aayadahani waxa ay isku xidhiidhiyaan cutubyada 11 iyo 12.

11:55 “inay isdaahiriyaan” Tani waxa ay tilmaamaysaa in shuruudda is daahirinta ee isu diyaarinta lidda Kor Maridda. Waxaa weli jira dood ku saabsan dheeraanta waqtigii uu Ciise wax baray, wacdiyey, oo uu ka dhex adeegay Falastiin. Injiillada waxa uu ugu qoran yahay in ha lama labo sano ay macquul tahay ama dhici karto. Arrintu si kastaba ha ahaatee, dhowr iidood ayaa ku jirta Yooxanaa (iid sannadle ah). Waxaa si dhab ah loogu qeexay saddex (cf. 2:13; 6:4; iyo 11:55) oo ugu yaraan lagu tilmaamay “iid dhexdeed” sida ku jirta 5:1.

11:57 Tani waa faallo kale oo tafatir ah oo uu Yooxanaa iska leeyahay.

SU’AALO FALANQAYN AH

Kani waa hage tafiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeen kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Sababtee ayaa Ciise u oggolaaday in Laasaros uu dhinto?
2. Yuu ahaa ki ay mucjisedu ku aaddanayd ama mu abbaadhayd?
3. Muxuu yahay Farqiga u dhexeeya sarakicidda iyo dib u bogsiinta?
4. Sababtee ayey hoggaamiyeyaashii Yuhuuddu iga biyo diideen bogsiinta Laasaros?

YOOXANAA 12

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Subkuiddii ka dhacday Beytaniya 12:1-8	Subkuiddii ka dhacday Beytaniya 12:1-18	Subkuiddii ka dhacday Beytaniya 12:1-6	Ciise ayaa lagu subkay Beytaniya 12:1-6 12:7-8	Subkuiddii ka dhacday Beytaniya 12:1-8
Fikir la dhan ah Laasaros 12:9-11	Fikirii lagu dilayey Laasaros 12:9-11	12:9-11	Fikir la dhan ah Laasaros 12:9-11	12:9-11
Guul ku soo galiddii Yerusaalem 12:12-19	Guul ku soo geliddii 12:12-19	Palm Sunday 12:12-19	Guul ku soo galiddii Yerusaalem 12:12-13 12:14 12:15 12:16 12:17 12:18-19	Masiixa oo soo galaya Yerusaalem 12:12-19
Qaar Giriig ah oo Ciise raadinaya 12:20-26	Midho dhalidda iniinta sarreenka 12:20-26	Ciise oo adeeggiisii soo gunaanaday 12:20-26	Qaar Giriig ah oo Ciise raadinaya 12:20-21	Ciise oo sii sheegaya dhimashadiisa iyo ammaanta ku dabo xigta 12:20-18a
Wiilka aadanaha waa in kor loo qaadaa 12:27-36a	Ciise oo sii saadyaya ku dhimashadiisa iskutallaabta 12:27-36	12:27-36a	Ciise oo ka hadlayay wax ku saabsan dhimashadiisa 12:27-28a 12:28b 12:29 12:30-33 12:34 12:35-36a	12:28b 12:29-32 12:33-36a
Rumaysad darrada Yuhuudda 12:36b-43	Kumaa Rumaystay War bixinteennii 12:37-38	12:36b-43	Rumaysad darrada dadka 12:36b-38	12:36b Rumaysad darrada Yuhuudda 12:37-38

	12:39-40	12:39:40
	12:41	12:41
Ku socoshada Iftiinka		
12:42-50	12:42-43	12:42-50
Xukunkii Ereyadii Ciise	Xukunkii Ereyadii Ciise	
12:44-50	12:44-50	12:44-50

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 1-50

- A. Afarta uu Injiilka ka kooban yahay waxaa ku qoran dubkiddii naagtu subagtay Masiixa. Sidaas daraadeed, waa suura gal in ay ahmiyad u leedahay afartii rasuul ee qortay Injiilka. Hasa yeeshee Markos. 14:3-9, Matayos. 26:6-13, iyo Yooxanaa. 12:2-8 waxay ku cadeeyeen in ay tahay Maryantii Beytaliya, Lasaroos walaashiis, meesha uu Luukos. 7:36-50 ne uu ku cadeeyay ama ku sheegay sida naag danbiilaa oo Galiliye joogta.
- B. Cutubka 12 aad waxaa kusoo xermaayo wax baradii Masiixa uu dadka wax baraayay (Fiiri. Aayada. 29). Wuxuu marar badan isku dayay in uu hogaamiye diimeedyadii Yahuuda ay imaanyeeshaan ama rumaysad. Cutubka 11 aad waxay ahayd isku dayidii uu rabay in dadkii joogay magaaladii Yerusaleem ay Imaan yeeshaan iyo rumaysad.
- C. Waxaa jira shan kooxood oo dadka ka mid ahaa ee lagu sheegay cutubkaan.
 1. Dadkii badnaa ee goob jooga u ahaa sarakicidii la sara kacshay Lasaroos, Aayada. 17
 2. Dadkii badnaa ee ka yimid Yeerusalem, Aayada. 9
 3. Dadkii badnaa ee xajinaayay una yimid Iidii Kormarida, Aayadaha. 12, 18, 29, 34
 4. Dad badan oo suuragal ay tahay in ay ahaayeen dad aan yahuud ahayn, Aayada. 20
 5. Dad badan oo ay suuragal tahay in ay ahaayeen hogaamiyeyaashii Yahuuda oo isaga rumaysnaa, Aayada. 42

NASB (UPDATED) TEXT: 12:1-8

¹Haddaba lix maalmood ka hor lidda Kormaridda, Ciise wuxuu yimid Beytaniya, meeshuu joogay Laasaros, kii Ciise kuwa dhintay ka soo sara kiciyey. ²Sidaas daraaddeed halkaasaa casho loogu sameeyey. Maartana waa adeegaysay, oo Laasaros wuxuu ka mid ahaa kuwa cuntada ula fadhiistay. ³Maryan haddaba waxay qaadday rodol cadar ah oo naaradiin qaaliya ah, waxayna marisay cagaha Ciise, oo timaheedii ayay caghiisa ku tirtirtay. Gurigiina waxaa ka buuxsamay udgoonkii cadarka. ⁴Laakiin Yuudas Iskariyod, oo ahaa mid xertiisii ka mid ah. oo gacan gelin lahaa, wuxuu yidhi, ⁵Maxaa cadarkan loogu iibin waayay saddex boqol oo dinar, oo loo siin waayay masaakiinta? ⁶Sidaas uma uu odhan dan uu ka lahaa masaakiinta, laakiin wuxuu u yidhi wuxuu ahaa tuug, oo kiishadda lacagta ayuu hayn jiray, wuuna kala bixi jiray wixii lagu rido. ⁷Haddaba Ciise ayaa yidhi, Daaya. Waxay u haysay maalinta aasniintayda. ⁸Waayo, masaakiintu mar walba way idinla jiraan, aniguse idinlama joogo mar walba.

12:1 “Haddaba lix maalmood ka hor lidda Kormaridda” tanu waa taariikh isku xiriirsan ee kala duwan kana yimid, Matayos. 26:2. Waa in la xasuusnaadaa in diirad saarida ugu horeysay ee Injiilka aanuu ahayn taariikhiyan, laakiin wuxuu u taagan yahay ficiladii masiixa oo muujinaayay runta shaqsiyadiisa ama jiritaankiisa iyo howshiisiiba. injiilku maahan taariikh nololeed shaqsiyaad laakiin waa maqaal kooban oo ku jahaysan dadka sidii ay ku baran lahaayeen xaqa runta.

12:2 “iyaga” tanu waxay u muuqataa in ay tilmaamayso dadkii deganaa magaalada Betaniya, oo ahaa dadkii cashada siiyay Masiixa iyo xertiisii iyagaa ku waynaynaayo soo noolaashihii Laasaroos. Si kastaba ha ahaatee, Matayos. 26:6, waxaanu waxay ku dhaceen gurigii Siimoon oo ahaa kii baraska qabay.

12:3 “rodol” Rodalkaan waa kalmad Giriig ah oo laga soo qaatay Rodalkii Roomaanka, oo la mid ah 12 ML. cadarkaan qaalgaa wuxuu ahaa meherkii Maryan arooskeeda la siiyay. Naago badan oo aan la qabin ayaa cadarka noocaan oo kalaa inta xarig ku xiraan qoorta suran jiray.



NASB: “rodol cadar ah oo naaradiin qaaliya ah”

NKJV: “rodol cadar qaaliya oo laga sameeyay qodob naaradiina”

NRSV: “rodol cadar qaali ah oo laga sameeyay naaradiin saafiya”

TEV: “Beeg dhan oo cadar aad qaali u ah lagana sameeyay naaradiin saafi ah”

NJB: “rodol saliid qaali ah oo laga sameeyay, naaradiin saafi ah”

Waxaa jira mala awaal badan oo tilmaamaayo macnaha waxa loo danleeyahay: (1) saafi; 2dareere; ama (3) meel magaceed. Cadarka laftiisa ayaa waxa uu ka yimid ama laga sameeyay geed Hamalayan la yiraah oo aad u caraf badan una qaaliyah. Fiiri Buuga uu qoray James M Freeman, *Manners and Customs of the Bible*, pp. 379-380.

▣ “marisay cagaha Ciise” injiilada kale dhacdadaan waxay ugu qoran tahay (waxaa suura gal ah in maryan ay ku mahdinaysay soo nooleentii Laasaroos, Aayada. 2) waxay ka hadlee in ay madaxiisa marisay. Waa suura gal in maryan ay korkiisa oo dhan ay marisay, iyadoo ka bilowday madaxiisa si cadne ay u gaartay cagahiisa. Sababta masiixa cagahiisa loo sheegayne waa isagoo isku kala baxshay miis gaabnaa oo uu xusulkiisa bidix saartay.

Tanune waa mid ka mid ah laba shay ee uu Yooxanaa Damacsanaa. Cadarkaan waxaa loo isticmaali jiray maydka marka la duugaayo (Fiiri. 19:40) waxaa suura gal ah in maryan ay wax ka fahamtay dhimashada Masiixa ku imaan doonto si ka badan Xertii masiixa (Fiiri. Aayada. 7). Eeg Mawduuca Gaarka ah 11:2.

▣ “Gurigiina waxaa ka buuxsamay udgoonkii cadarka” waa goobjoog wanaagsan wuxuu sheegay faahfaahin tifaftiran. Yooxanuhu wuxuu si fiican u xasuustaa wax walbo sidey ahaayeen!

12:4 “Yuudas Iskariyod” weedha “Iskariyod” waxay leedahay laba macno oo ay suura gal tahay in ay kazoo timid: (1) Magaaladii Yahuda (Qiryoot Xesroon Fiiri. Yashuuca 15:25) ama (2) macno ahaan ”Mididii Dilaaga”

injiilka inta qortay oo dhan Yooxanaa wuxuu ka sheegay hadal cad Yuudas (Fiiri. Aayada 6) Fiiri tafaasiilka buuxa ee 6:70-71).

▣ “**gacan gelin**” tane waa rayi kaloo faalla. Weedhane si caadi ah uma lahan macno kaloo maldahan. Asal ahaan wuxuu macnihiisu yahay “iska dhiibid” ama “u gayn” ee macnaha sharciga ama wax ku aaminid. Eeg fiirada. 18:2.

12:5 “saddex boqol oo dinar” Diinaarku wuxuu ahaa lacagta ay maalintii ku shaqeyaan shaqaalaha iyo askartaba sidaas daraadeed lacagtaan waxayba ku dhawayd mushaarka sanadka la qaato.

12:6 aayadaane waa rayi kaloo faalla isne. Yooxanaane si ka badan qoraayaasha kale ee injiilka ayuu u canbaareeyay Yudaas.

▣

NASB, NKJV “**sanduuqa lacagta**”

NRSV “**kiishadda lacagta**”

TEV “**boorsada lacagta**”

NJB “**daqliga guud**”

Tan macnaheedu waa sanduuq yar oo asal ahaan ay isticmaali jireen musikiiste yaasha si ay ugu qaataan qalabkooda afka.

▣ “**wuuna kala bixi jiray wixii lagu rido.**” Macnaha Giriiga waa “hayn” waxaa loo isticmaali jira labo macnoo kala duwan: (1) wuxuu hayn jiray sanduuqa laakiin (2) weliba wuxuu hayn jiray waxa ku jira sanduuqa. Hadalkaan cadne waxaa ku jiri karta in Yuudaas uu muujinaayay sida uu u daneenaayo masaakiinta ee aayada 5 oo runtii u noqonaysay sabab uu isaga naftiisa u xadi karo.

12:7 aayadaane cajiib ayay leedahay. Waxay caadiyan la xariirtaa fiicnaanta iyo ficilka deeqsinimada la sameeya marka qof la duugaayo (Fiiri. 1940). Tane waa hadal kaloo cad ee nabinimadii Yooxanaa.

12:8 “masaakiintu mar walba way idinla jiraan “ tane waxay la xariirtaa Bilowgii. 15:4, 11. In masaakiinta laga fekiro maaheen wax la mamnuucay laakiin muhiimadaa ahayd joogitaanka Masiixa ee Ciisaa (Fiiri. Aayada. 35; 7:33; 9:4). Axdiga Hore ee baybalka ma jirin mid la mid ah qoraaladii xiligaas jiray daryeelka xuquuqda iyo ahmiyad siinta in la daryeelo masaakiinta.

NASB (UPDATED) TEXT: 12:9-11

⁹Haddaba dad badan oo Yuhuud ah baa waxay ogaadeen inuu halkaas joogo, wayna u yimaadeen, ma aha Ciise aawadii oo keliya laakiin inay arkaan Laasarosna, kii uu kuwii dhintay ka soo sara kiciyey. ¹⁰Wadaaddadii sare waxay ku tashadeen inay Laasarosna dilaan. ¹¹Waayo, aawadiis ayaa Yuhuud badani ku tagtay oo Ciise rumaysatay.

12:9 “Haddaba dad badan oo Yuhuud ah baa waxay ogaadeen inuu halkaas joogo” weedhaane waa mid aan badanaa lagu isticmaalin “Yahuuda” Yooxanaa. Badanaa waxay tilmaamaysay hogaamiye diimeedyo kazoo horjeeda Masiixa. Si kastaba ha ahaate. Gudaha aayadahaan 11:19, 45; 12:17, waxay u muuqataa in ay tilmaamayso dadka magaalada Yeerusaalem oo saaxiibo la ahaa Laasaroos aaskiisine u yimid.

12:10 “Wadaaddadii sare waxay ku tashadeen inay Laasarosna dilaan” waxay rabeen in ay cadaynta tirtiraan! Sababtane waxay cabsi ay qabeen (Fiiri. 18:48) iyo masayr (Fiiri. 11:48; 12:11).

Waxaa suura gal ah in ay u haysteen soo noolaanshaha masiixa in ay tahay wax keli ah, wax mar mar dhaca. Indhala’anta iyo eexashada hogaamiyeyaashaan Yahuuda ayaa wuxuu ka turjamaa ama muujinaa mugdiga bini aadamkaan daciifkaa.

12:11 tanu waxay xiriir danbe la leedahay aayada 11:45. Eeg Mawduuca Gaark ah Yooxanaa 2:23.

NASB (UPDATED) TEXT: 12:12-19

¹²Maalintii xigtay dad badan oo u yimid iiddii, markay maqleen inuu Ciise Yerusaaalem imanayo, ¹³waxay qaateen laamihii geedaha timirta ah, oo ay baxeen inay ka hor tagaan, iyagoo ku dhawaaqaya Hoosanna, waxaa barakadaysan kan Rabbiga magiciisa ku imanaya oo boqorka Israa'iil ah. ¹⁴Ciise wuxuu helay dameer yar oo fuulay, siday ugu qoran tahay, ¹⁵Ha biqin, gabadhii Siyoonay: bal eeg, Boqorkaagu waa imanayaa isagoo fuushan qayl dameereed. ¹⁶Markii hore xertiisii waxyaalahaas ma ay garan. Laakiin markii Ciise ammaanmay dabadeed ayay xusuusteen in waxyaalahaas xaggiisa laga qoray iyo hl waxyaalahaas lagu sameeyey isaga. ¹⁷Haddaba waxaa marag furay dadkii badnaa ee la joogay markuu Laasaros xabaasha uga yeedhay oo uu kuwa dhintay ka soo sara kiciyey. ¹⁸Sidaa daraaddeed dadkii badnaa waa u kaceen inay ka hor tagaan, waayo, waxay maqleen inuu calaamadaas sameeyey. ¹⁹Haddaba Farrisiintii waxay dhexdoodii isku yidhaahdeen, Waad arkaysaan sidaydnaan waxba u taraynin. Eega, dunidii oo dhan baa raacdaye.

12:12-19 Tani waa qaabkii Yooxanaa ‘ ee Masiixa uu si farxad leh ugu galay Yeerusaalem (Fiiri. Matayos. 21:1-11; Markos. 11:1-11; Luukos. 19:29-38).

12:12 “dad badan oo u yimid iiddii” raga Yahuuda waxaa jirtay sedex Iidood oo laga rabay (Fiiri. Baxniintii 23:14-17; Laawiyiintii 23; Sharciga Kunoqoshadiisa. 16:16). Yahuuda ku nool Falistiin dibadeeda waa laga rabay inta inta ay nool yihiin (dhaqan ahaan) waxay ahayd in ay Yerusaaalem Iida yimaadaan. Inta lagu gudo jiro Iidahaan joogtadaa, Yeerusaalem waxaa ka buuxsami jiray dad ka badan sedex ilaa shan u jibaar inta ku nool mararka kale. Kalmadaane waxay tilmaamee fara badnaanta dadkaan xajinaayay oo ahaa kuwii dhagaysanaayay Masiixa rabayne in ay arkaan (Fiiri. 11:56).

12:13 “laamihii geedaha timirta ah” waa kalmad aan caadiyan ahayn kalmad Giriiga ee geedka timirta. Qaar waxay rumaysan yihiin in mar geedka timirtaa uu ku waynaan jiray daadaga buur Seytuun (Tusaalle. Josephus), meesha ay kuwa kalene ka aaminsan yihiin in laga keenay magaalo ku taal webi Urdun. Waxay u muuqdaan in ay yihiin calaamado ka turjumaayo guul ama farxad (Fiiri. Muujintii. 7:9). Waxaa lagu ixticmaali jiray si joogtaa sanad walba Iida macbudka (Fiiri. Laawiyiintii. 23:40) iyo iida kormarida (waa dhaqan jiray xiligii Towreedaa).

☐ “bilaabeen inay ku dhawaaqaan” waa ficil aan caadi ahayn kazoo u taagan (1) in lagu cel celsho ficil hore u dhacay ama (2) bilaabid ficil xili hore ahaa.

☐ “Hoosanna” weedhaan macnaheedu waa “hada badbaadi” ama “fadlan badbaadi” (Fiiri. Sabuurka 118:25-26). Inta lagu jiro Iida Kormarista waxaa si joogtaa loogu celcelinaayay Sabuurada RABBI amaankaa (Fiiri. Sabuurka. 113-118) waxay dhici jirtay marka xujaajtu galayaan macbudka. Wax badan oo ka mid ah ficiladaan iyo kalmadahaan ayaa lagu soo celcelin jiray sanad walba inta lagu guda jiro Iida Kormarista. Laakiin sanadkaan qaaska waxay macno wayn ka heleen Masiixa! Dadkaan badane sidaan ayuu dareenkoodu ahaa. Faarisiyiintii tan ayay garansanaayeen.

☐ “kan Rabbiga magiciisa ku imanaya” tanu waa sidii uu Masiixu isku sheegaayay in uu yahay. Wuxuu ahaa kii lasoo diray! Wuxuu matalaayay YAHWEH.

☐

NASB. “Xataa Boqorka Israa’iil”

NKJV, NRSV

TEV, NJB “Boqorka Israa’iil”

Kalmadaan kama mid ahayn Sabuurkii laakiin dadkii badnaa ayaa ku darsaday. Waxay u muujataa in ay tahay faahfaahin ku wajahan Masiixa in uu yahay Boqor Masiixii la sugaayay ee imaatinkiisa lagu balan qaaday 2 Samuu’eel 7 (Fiiri. 1:49; 19:19).

12:14 “dameer yar” Dameeradu waxay ahaayeen ciidanka Boqortooyada oo ay fuulaan boqorada Israa’iil (Fiiri. 1 Boqorradii. 1:33, 38, 44). Boqorka keliyah ayaa fuuli jiray dameerkiisa, sidaas daraadeed aad ayay muhiim u ahayd in masiixu dameer aan weli hore loo fuulin uu fuulo (Fiiri. Markos. 11:2).

12:14-15 “sida qoran” waa mid tixraaceedu ka yimid Sekaryaah. 9:9. Dameerkaan Boqornimada Masiixa keliyah kama hadleeso laakiin weliba waxay cadaynaysaa sharaf badnidiisa. Masiixu umuu imaan isagoo hogaaminaayo ciidan wayn oo ah siday Yahuudu filaysay, laakiin isagoo ah adoonkiisa silica ee dameerka fuushan siday ugu qoran tahay Ishacyaah. 53.

12:16 “Markii hore xertiisii waxyaalahaas ma ay garan” tane waa marqaati fur kale, waa xasuustii Yooxanaa ee xanuunka lahayd. Tane waa muuqaal kaloo soo noq noqda (Fiiri. 2:22; 10:6; 16:18; Markos. 9:32; Luukos. 2:50; 9:45; 18:34). indhahooda ruuxinkaa waxay kaliyahoy si fiican u furmeen, kor aadistii iyo maalintii bentakoostaalka kadib.

▣ **“Laakiin markii Ciise ammaanmay dabadeed ayay xusuusteen”** tani waxay ka mid ahayd howshii Ruuxa Quduuska ah (Fiiri. 14:26 iyo 2:22).

Aaydaan waxay weliba muujinaysaa in ragii injiilka qoray ay ku qaabeeyeen injiiladooda qibradoodii shaqsiyanka ahayd ee ay u lahaayeen sarakici dii masiixa.

Taariikhda masiixa ayay matalaan, ee ku jira taariikhda la xariirta horamarka, waxayna qariyaan amaantiisa ilaa heerkooda ugu sareeyo, laakiin Yooxanaa wuxuu ku qoray Injiilka oo dhan iftiinka masiixa amaanta miirana. Injiilada waxay muujiyaan xasuustii danbe iyo baahidee rumaysad midaynta ragaan waxyiga ilaah siiyay. Intaas kadib waxaa jira labo taariikh oo asal ah (Masiixa iyo injiil qore yaasha) labada oo ah waxyi heesta yaal.

▣ **“ammaanmay”** eeg fiirada 1:14.

12:17 eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8. Eeg Fahanka Macnaha Guud, C.

12:19 “Farrisiintii waxay dhexdoodii isku yidhaahdeen” tanune waa wax sii sheegid kaloo nebinimaa. Waxay la xariirtaa (1) Yahuuda, 11:48; 12:11 iyo (2) Giriigtii, Aayada. 20-23. Waxay muujinee labo taariikhoo asal ah: Masiixa iyo Kaniisadii ugu horeysay.

NASB (UPDATED) TEXT: 12:20-26

²⁰Kuwa wakhtiga iidda u kacay inay Ilaah caabudaan, waxaa ku dhex jiray qaar Gariig ah. ²¹Kuwaas haddaba waxay u yimaadeen Filibos oo ahaa reer Beytsayda ee Galili, wayna weydiisteen oo waxay ku yidhaahdeen, Sayidow, waxaannu doonaynaa inaannu Ciise aragno. ²²Markaasaa Filibos u yimid oo Andaros u sheegay, oo haddana Andaros iyo Filibos baa wada yimid, oo ay Ciise u sheegeen. ²³Kolkaasaa Ciise u jawaabay, oo wuxuu ku yidhi, Saacaddii way timid uu Wiilka Aadanahu ammaanmi lahaa. ²⁴Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Xabbad sarreen ah haddaanay dhulka ku dhicin oo dhiman, keligeed bay iska jiraysaa, laakiin hadday dhimato, midho badan bay dhashaa. ²⁵Kan naftiisa jecel, waa lumiyaa, kan dunidan naftiisa ku nebcaadaase, wuu hayn doonaa tan iyo nolosha weligeed ah. ²⁶Qof uun hadduu ii adeego, ha i soo raaco, meeshaan joogona, midiidinkayguna wuu joogi doonaa. Qof uun hadduu ii adeego, Aabbuhu waa murwayn doonaa isaga.

12:20 “qaar Gariig ah” tan waxaa loo isticmaalay qaab Jantaalnimaa ee si toos ah uma ahan Qoomiyada Giriiga.

▣ **“Kuwa wakhtiga iidda u kacay inay Ilaah caabudaan, waxaa ku dhex jiray”** ficil xaadir ah, waxay muujinee in ay dabeecad ka ahayd aaditaanka Iida. Labo midood ayay ahaayeen (1) Ilaah ka cabsadeyaal ama (2) rumaysadayaal cusub oo albaabka taagan. Ugu horayntii waxaay ahaayeen caabudeyaal si joogtaa u jooga macbudka tan labaadne waa kuwo si rasmi ah usoo galay diintii Yahuuda.

12:21 “waxayne bilaabeen in ay isagii waydiiyaan” waa ficil aan rasmi ahayn kazoo macnahiisu yahay (1) marar badan in ay waydiiyeen ama (1) waxay bilaabeen oo keliyah in ay isaga waydiiyaan. Waxay rabeen in ay

wareesi qaas ah la yeeshaan Masiixa. Run ahaantiine tanu waxay ahayd wacdigiisa rasaaleed ee ugu danbeeyay ee dhacay Masiixa intaanu dhiman (Fiiri. Aayada. 23).

12:22 Filibos (Faras jeclihii iyo Andaros (Ragow) labadaas keliyah ayaa ahaa nimankii xerta ka mid ahaa ee lahaa magac Giriig ah. Waxaa suura gal ah in ay arintaan u ogolaatay Giriigtaan in ay (TS Jantaal) dareemaan iyagoo usoo socda iyaga.

12:23 “**Saacaddii way timid**” tanune waa Ficil asal ah Yooxanaa badanaa weedhaan “Saacadii” wuxuu u isticmaalay si uu u tilmaamo daldalaadii iyo sara kicidii iyadoo ah dhacadii xaaladii howshii Masiixa (Fiiri. 12:27; 13:1, 32; 17:1). Masiixu wuxuu cadeeyay in uu yimid idaha lumay ee reer binu israa’iil (Fiiri. Matayos. 15:24). Hadane fariintiisii waxay gaarsoosaa Jantaaliska !

▣ “**Wiilka Aadanahu**” tanu waa oraah Aramic ah taas oo macnaheedu yahay “bini aadam” (Fiiri. Sabuurka 8:4; Yexesqeel. 2:1). Si kastaba ha ahaatee waxa lagu adeegsaday Daanyeel 7:13 iyadoo lala xidhiidhiyay Ilaahnimada. Tani waa Ciise lafiisa oo lala xidhiidhiyay inay koobsanayso labo dabeecadood oo isugu jira aadane iyo Ilaah (Yooxanaa 4:1-3).

▣ “**ammaanmi lahaa.**” Ciise dhimashadiisa hadiyo jeer waxa lagu sheegay “Ammaantiisa.” Erayga “ammaan” dhowr jeer ayaa macnaha halkan lagu adeegsaday (aayadda 28 [labo jeer]; 32, iyo 33). Waxa hadiyo goor loo adeegsaday iyadoo lagu kala soocayo dhimashada iyo sarakicidda Ciise (13:1,32; 17:1). Eeg Fiirada 1:14.

12:24 “**Xabbar sarreen ah haddaanay dhulka ku dhicin oo dhiman**” tanu waa luqad sharaxan, waxyaalaha sidey ugu muuqdaan in ay u eg yihiin shan macno, sidaas oo kale ayaa xabad sareen ahu u dhali kartaa wax badan (Fiiri. 15:2, 4, 5, 8, 16; 1 Korintos 15:36). Dhimashadiisii ayaa nolosha runtaa u keentay qaar badan (Fiiri. Markos 10:45).

▣ “**haddii**” waxa jira jumlad shuruudeedyo heerka saddexaad ah oo taxane ah kuwaasi oo tusinaya waxqabad (aayadaha 24,26,32,47).

12:25 “**Kan naftiisa jecel, ,**” waa erayga Giriigga ah ee *psyche*, kaasi oo tilmaamaya shakhsiyadda aadana ama awoodda nool (cf Matayos. 10:39; 16:24-25; Markos 8:34-35; Luukos 9:23-24). Marka qof isku halleeyo Masiixa waxa uu siiyaa nolol cusub. Nolosha cusub waa hadiyad ka timid Ilaah oo adeeg loogu talo galay, adeegsi shakhsi ahaaneedna looguma talo galin. Rumaystayaashu waxay wakiillo ka yihiin noloshan. Waxa la inaga xoreeyay addoonsigii denbiga si aan u noqono adeegayaasha Ilaah (Rooma 6:1-7:6). Adhi jirayaasha beenta ah ee cutubka 10 waxay isku dayeen inay “badbaadiyaan” noloshooda iyagoo ordaya. Laakiin Ciise naftiisa ayuu hoos u dhigay, sidaasoo kalena waxa laga rabaa rumaystayaasha (cf. II Cor. 5:12-15; Gal. 2:20).

▣ “**waa lumiyaa**” waa fal wakhti xaadirka jooga oo wax tusinaya. Erayga (eeg Mawduuca Gaarka ah 10:10) waxa macnihiisu yahay “burburin, ” waana eray kasoo horjeeda “nolosha weligeed ah.” haddii qofku aanu Masiixa rumaysnayn, tan oo keliya ayaa ah meesha uu mari karo. Middani waxa weeyi luminta ama waayista xidhiidha shakhsi ahaanee ee lala leeyahay Ilaah.

▣ “**nebcadaase**” xagga Cibraaniga marka laga eego waxa loo adeegsadaa is barbardhigga. Ilaah waa inuu mudnaanta lahaado wax kastana ka horreeyo (cf. Yacquub naagihisii, Bilowgii. 29:30, 31; Sharciga Kunoqoshadiisa. 21:15; Ceesaw iyo Yacquub, Malaakii. 1:2-3; Rooma 10-13; qof qoyskiisa, Luukos 14:26).

▣ “**nolol**” eraygani Giriigga wuxuu ku yahay *zoe*. Marar badan ayaana lagu adeegsaday Injiilka Yooxanaa iyadoo tilmaamaysa (1) nolosha ruuxiga ah; (2) nolosha weligeed ah; (3) nolosha casriga cusub; iyo (4) nolosha sarakicista. Nolosha runta ahi waxa ay xor ka tahay “nafta” oo ah ruuxa leexashada.

12:26 “**haddii**” waa weedh shuruudeed heerka saddexaad ah oo faa’idaynasa suurta galnimada xaqiijin

▣ **“ha i soo raaco”** waa ficil amar ah oo soconaya tusinayana xidhiidh daa’imis ah (Yooxanaa 15). Tani waa waxbarista la iska indho tiro ee laga rago qoduusiinta iyo dadaalkooda (eeg Mawduuca Gaarka ah 8:31). Awoodda Ilaah iyo xorriyadda aadanuhu badanaa waa mid ay ku wareeraan fuqahadu, laakiinse maaha labo iskasoo horjeeda. Ilaah hadiyo goor isaga wax bilaaba (6:44, 65) isaga ayaana qorshayaasha dejiyga, laakiinse aadanaha waxa uu ka rabaa inay ka jawaaba celiyaan oo la yimaaddaan towbad keen iyo rumaysad (cf. Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 20:21), labadubana waa go’aan ugu horraynta ah iyo raacitaan ku dhisan xernimo. Dadaalkuna waxa uu caddayn u yahay inaan isaga garanayno (cf. Matayos. 10:22; 13:20-21; Gal. 6:9; I Yooxanaa 2:19; Muujintii. 2:7, 11, 17, 26; 3:5, 12, 21).

Caqiidada Masiixiyaddu iyadoo ku salaysan kitaabka haddana way iska hor timaaddaa. Suugaanta barigu waxa ay ku salaysan tahay iyaga fahankooda, waxaana jira fikiro kala duwan. Badnaa akhristayaasha casriga ah ee reer galbeedkuna tooda ayuunbay kasoo qaadaan midda runta ah.

Si aan u soo bandhigo faalladayda, waxaan kusoo daray qayb ka mida Simanaar Fasiraaddayda Kitaabka ah oo cinwaankiisu kusoo saabsanaa iska hor imaadka:

“Is khilaafka kitaabiga ah

1. Fahankani waxa uu ahaa ka aniga aadka ii caawiyay anigoo ku kalsoon isla markaana jecel Kitaabka oo ah Erayga Ilaah. Iyadoo la isku dayayo in kitaabka si runa loo qaato, waxa muuqda farqiga u dhexeeya aayadaha kala duwan ee muujinaya xaqiiqada la rabo oon ahayn siyaabo kale. Qoraal waxyi ahi ma nasakhi karo mid kale oo waxyi ah, runtuna waxa ay ka timaaddaa marka la garanayo dhammaanba Qorniinka (dhammaa, oon ahayn qayb keliya, waa waxyi, 2 Timoteyos 3:16-17). Mana aha in lasoo xigto qayb keliya.
2. Badanaa xaqiiqooyinka kitaabiga ahi (suugaanta bariga) waxa loo soo jeediyaa sidii wax iska hor imanaya (xasuuso qorayaasha Axdiga Cusub, marka laga reebo Luukos, waa Cibraaniyiin, wax ku qorayay Giriig). Qoraallada Xikmadda iyo qoraallada suugaanta waxa lagu soo jeediyaa layman siman. Waxa haddaba qaabkani u shaqeeyaa isda qaybaha ama qoraallada isku midka ah, dhinac marka laga eegana labaduba waa run! Haddaba iska hor imaanshahani waxa uu aad ugu xanuun badan yahay dhaqannadeena.
 - a. Qadarka iyo doonista xorta ah ee aadanaha
 - b. Ilaalinta rumaystaha iyo baahida loo qabo dadaalka
 - c. Denbiga asalka ah iyo denbiga caadiga ah
 - d. Ciise oo Ilaah ah iyo Ciise oo aadane ah
 - e. Ciise oo la siman Aabbaha iyo Ciise oo adeege u ah Aabbaha
 - f. Kitaabka oo ah erayga Ilaah iyo aadanaha oo qoray
 - g. Denbi la’aanta (Rooma 6) iyo denbi yaraanta
 - h. Xaq ka dhigista hore iyo quduusnaanta oo ay kasoo horjeeddo quduusnaanta koritaanka ku jirta
 - i. Xaq kaga dhigista rumaysadka (Rooma 4) iyo xaq ka dhigista shaqada (Yacquub 2:14-26)
 - j. Xorriyadda Masiixiyadda (cf. Rooma. 14:1-23; I Korintos. 8:1-13; 10:23-33) iyo masuuliyadda Masiixiyiinta (cf. Galatiya. 5:16-21; Efesos. 4:1).
 - k. Xadays la’aanta Ilaah iyo awooddiisa
 - l. Ilaah oon la garan karin iyo Qorniinka iyo Masiixa oo laga ogaan karo.
 - m. Bawlos tusaalayaashiisa badan ee badbaadada
 - (1) carruurta Ilaah
 - (2) quduusnaanta
 - (3) xaqnimada
 - (4) badaadinta
 - (5) amaanmitaanka
 - (6) qadarka
 - (7) dib ugula heshiinta
 - n. Boqortooyada Ilaah oo joogta iyo mustaqbalka danbe
 - o. Towbad keenka oo ah hadiyad ka timid Ilaah iyo towbad keenka ka jawaab celinta badbaadada (cf. Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 20:21).
 - p. Axdiga Hore oo negaadi ah iyo Axdiga Hore oo la dhaafay (cf. Matayos. 5:17-19 vs. 5:21-48; Rooma 7 vs. Galatiya 3).
 - q. Rumaystayaashu waa adeegayaal/addoomo ama carruur”

☐ **“meeshaan joogona, midiidinkayguna wuu joogi doonaa”** middan waxa lagu soo celinayaa 14:3; 17:24; II Korintos. 5:8; Filiboy. 1:23; I Tesaloniika. 4:17! Masiixiyaddu ugu horrayn waa xidhiidh shakhsi ahaaneed oo lala yeesho Ilaah, ujeedada xidhiidh la yeelashaduna waa joogitaankiisa iyo weheshigiisa.

Waxa la inoo abuuray inaan wehesho la yeelano Ilaah (Bilowgii 1:26-27). Badbaadaduna waa soo celinta is weheshigii Beer Ceeden ee jabay. Yooxanaa waxa uu adkaynayaa in xidhiidhka hadda lasoo celiyay.

NASB (UPDATED) TEXT: 12:27-36a

²⁷Haatan naftaydu waa murugootay, oo maxaan idhaahdaa? Aabbow. saacaddan iga badbaadi. Laakiin taas aawadeed ayaan saacaddan u soo gaadhay. ²⁸Aabbow, magacaaga ammaan. Haddaba waxaa samada ka yimid cod leh, Waan ammaanay. waanan ammaani doonaa mar kale. ²⁹Haddaba dadkii badnaa oo ag taagnaa, way maqleen, oo waxay yidhaahdeen, Waa onkod. Qaar kale waxay yidhaahdeen, Malaa'ig baa la hadashay isaga. ³⁰Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Codkaasu aawaday uma imanin, laakiin wuxuu u yimid aawadiin. ³¹Imminka weeye markii dunidan la xukumi lahaa. imminka kan madaxda dunida ah dibaddaa lagu tuuri doonaa. ³²Aniguna haddii kor layga qaado dhulka. dhammaan xaggaygaan u soo jiidi doonaa. ³³Wuxuu waxaas u yidhi inuu tuso siduu u dhiman doono. ³⁴Haddaba dadkii badnaa waxay ugu jawaabeen, Waxaannu sharciga ka maqallay in Masiixu weligiis jiri doono. Sidee baad u leedahay. Wiilka Aadanaha waa in kor loo qaado? Waa ayo Wiilka Aadanahu? ³⁵Ciise haddaba ayaa ku yidhi, Weli in yar nuurka ayaa idinla jiraya. Socda intaad nuurka haysataan, si aan gudcurku idiin soo gaadhin. Kan gudcurka ku socdaana ma yaqaan meeshuu u socdo. ³⁶Intaad nuurka haysataan, rumaysta nuurka, inaad noqotaan wiilasha nuurka.

12: 27 “Haatan naftaydu waa murugootay,” Kani waa fal tegay oo aan toosnayn oo wax caddaynaya. Wax qabashada (Aabbaha, Shayddaanka, duruufaha, iwm.) laguma sharraxin. Waa erey aad u xooggan oo siyaabo dhowr ah loogu isticmaalo Axdiga Cusub.

- a. Cabsidii Herodos (Matayos 2:3)
- b. Cabsidi xerta (Matayos 14:26)
- c. Ciise werwerkiisii aan degganayn (Yooxanaa 12:26; 13:21)
- d. Kaniisaddii ku tiil Yerusaaalem (Falimaha Rasuullada 15:24)
- e. Macallimiinta beenta ah joojintoodii kaniisadaha Galatiya (Galatiya 1:7)

Tani waxaa weeye Yooxanaa waddada uu Ciise aadane ahaantiisa kula xidhiidhinayo la hardankiisa xanuunka ee ku qodbiddiisa iskutallaabtaa (cf. Markos 14:32ff). Yooxanaa ma uusan diwaan gelin Ciise xanuunkuu ku qabsaday Getsemane, laakiin tani isku waqti ayey ahayd.

☐ **“saacaddan iga badbaadi”** Wada hadal badan ayaa ka taagan sida macnaha dhabta ah ee hadalkani uu ahaa. Tani ma baryaa (tusaale ahaa, Matayos 26:39)? Ma wax layaab leh ficilkii oo ay tahay in aan la qaban.

☐ **“taas aawadeed ayaan saacaddan u soo gaadhay”** Noloshii Ciise waxa ay ku baahday qorshe uu Ilaah raalli ka yahay ama rabbaani ah (cf. Luukos 22:22; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28) oo uu Ciise si buuxda u fahansanaa (cf. Matayos. 20:28; Markos 10:45).

12:28 “magacaaga ammaan” Aabbuhu waxa uu uga jawaabayaa aayadda. 28b. Ereygan “ammaan” waa ay nimco la socoto. Waxa uu u taagan yahay

1. Ammaan horay u jirtay (cf. 17:5)
2. Ciise muujintiisii Aabbaha (cf. 17:4)
3. Ciise dhimashadiisii iyo sarekiciddiisii (cf. 17:1)

Eeg tasmada 1:14.

☐ **“waxaa samada ka yimid cod”** Rabbaaniyiintii waxa ay middan ugu yeedheen *bath-kol*. Laga soo bilaabo xilligii Malaakii wax cod nebiyeed ah kama dhex jidhin Israa'iil. Haddii doonista Ilaah la muujinayo, waxaay ahayd in cod uu samada ka yimaado. Injiilladu waxa ay sheegayaan in Ilaah hadlay saddex jeer intii lagu guda jiray noloshii Ciise.

1. Xilligii baabtiiskii Ciise, Matayos 3:17

2. Xilligii isbeddelka muuqaalkiisa, Matayos 17:5
3. Iyo halkan aayaddan dhexdeeda

12:29 “Haddaba dadkii badnaa oo ag taagnaa, way maqleen, oo waxay yidhaahdeen” Waxaa jira labo tafsiiir oo ku saabsan wixii dhacay: (1) Waxaa jiray onkad. Tan Axdigii Hore waxaa loo adeegsaday Ilaah oo la hadlaya Reer Bani Israa’iil (cf. II Samuu’eel. 22:14; Ayuub 37:4; Sabuurrada. 29:3; 18:13; 104:7) ama (2) Malaa’il la hadashay Isaga. Tani waxa ay siman tahay wareerkii ku saabsanaa waayo-aragnimadii Bawlos sida ku jirta Falimaha Rasuullada 9:7; 22:9.

12:30 “Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Codkaasu aawaday uma imanin, laakiin wuxuu u yimid aawadiin” Weedhani waa is barbardhig xagga luuqadda Samatigga ah. Tani macnaheedu waxaa weeye iyaga isagama aysan ahaan ee horay ayey ugu ahayd (cf. 11:42).

12:31 “Imminka weeye markii dunidan la xukumi lahaa” Kani waa dhisme hadal oo is le’eg oo weedhan soo wsocota raacsan tahay ee ah (“imminka kan madaxda dunida ah dibadda lagu tuuri doonaa”). Waqtigii ay middani dhacday lama caddayn (arag MAWduucan Gaarkaah ee soo socda).

Waxa aan hubaashi ku raacay F. F. Bruce, *Answers of Questions* (bogga. 198), in aayadda. 31 ay tusaale kale u tahay middii uu C. H. Dodd ku magacaabay “realized eschatology.” Laakiin Yooxanaa middan waxa uu ka qabaa, in Ciise Masiix uu durbaba kuwa rumaysadka leh u keenay badbaado kuwa aan rumaysadka lahaynna xukun. Haddii si kale loo dhahana waxa ay la mid noqonaysa hab naxwe oo lagu magacaabo “prophetic perfect.” Waxa mustaqbalku waxa uu xaqiiqo u ah sidii horayba loo qeexay in uu u dhacayo!

▣ **“kan madaxda dunida ah”** Tani waxda ay tilmaamaysaa xoog shar oo shaqsi ah (cf. 14:30; 16:11) oo afka Cibraaniga lamid ah “Shayddaan” ama “cadaw” (cf. Ayuub 1-2) afka Giriiggana “Sharwadaha” ama “fidnoole” (cf. Matayos. 4:1, 5, 8, 11; 13:39; 25:41; Yooxanaa 6:70; 8:44; 13:2; II Korintos. 4:4; Efesos. 2:2). Labadan erey waa kuwo isku mid ah sida ku jirta Matayos. 4:1-11 iyo Yooxanaa 13:2, 27. Waa uu ka eryan yahay jannada is uusan u eedayn ama u fidnayn raacayaasha Ciise Masiix.

MAWDUUC GAAR AH: SHARKA SHAKHSI AHAANEED

Kani waa mawduuc adag siyaabo dhowra aawadood:

1. Axdiga Hore muu muujinin cadaw kasoo horjeeda wanaagga, laakiin wuxuu muujiyay adeegaha YHWH oo aadanaha ku xidhiidhinaya kuna eedaynaya xaqnimo la’aan.
2. Fikradda ah cadawtnimada Ilaah uu leeyahay waxay ka timid saamaynta diintii Aasiyaanka (*Zoroastrianism*), waxaanay saamayn ku yeelatay Yuhuudda.
3. Axdiga Cusubi wuxuu si dhammaystiran u sii horu marinayaa aragtida Axdiga Hore, laakiinse wuxuu ku salaynayaa dabaqado kalasooacan.

Si kastaba ha ahaatee, daraasaynta amaba barashada sharka qayb ka mida oon ahayn Kitaabka, ayaa waxay yihiin kuwo laga ay ka hadlaan diimaha bariga, kadibna Axdiga Cusub waxa calaamad ka dhex noqday, waxyaalaha ay aaminsanaayeen Aasiyaanka iyo Roomaanku.

Haddii markaas qof rumaysadkiisu uu yahay mid ku salaysan waxyiga ku sugan Qoraallada Quduuska ah, Axdiga Cusubi wuxuu noqonayaa dhammaystirka waxyiga.

Masiixiyiinu waa inay iska ilaaliyaan waxyaalaha dhaqan ahaan Yuhuuddu aaminsan yihiin iyo waxyaalaha kale ee ay sheegayaan qoraallada reer galbeedku (Dante, Milton) marka la qeexayo waxa Kitaabku arrinta ka qabo. Waxaa haddaba jirta in xagga waxyiga marka la eego arrintani ay tahay mid qarsoon. Ilaah muu dooranin inuu wada muujiyo dhammaanba dhinacyada khuseeya sharka asalkiisa, ujeedadiisa, laakiinse waxa uu muujiyay waxyeelladiisa.

Axdiga Hore dhexdiisa erayada la xidhiidha Shaydaanka ama eedeeyayaasha waxa loo kala saaraa saddex kala duwan:

1. Eedeeyayaasha aadanaha (1 Samuu’eel 29:4; 2 Samuu’eel 19:22; 1 Boqorradii 11:14,23,25; Sabuurka 109:6).
2. Eedeeyayaasha malaa’igaha (Tirintii 22:22-23; Sekaryaah 3:1)
3. Eedeeyayaasha jinniga (1 Taariikhiihii 21:1; 1 Boqorradii 22:21; Yexesqeel 13:2)

Haddaba, kitaabka Bilowgii 3 ayaa ah meesha lagu tilmaamay Shaydaanka (Book of Wisdom 2:23-24; 2 Enoch 31:3), manay intaas kaddib jirin waxay rabbaaniyiintu ka samayn karaan arrintan (*Sot* 9b iyo *Sanh* 29a). “wiilasha Ilaah” ee Bilowgii 6 ayaa malaa’igo ku noqday I Enoch 54:6. Haddaba, arrintan uumaan tilmaamin, inaan ka hadlo saxsanaanteeda fiqi ahaaneed, laakiin waxa weeyi si aan u muujiyo heerarkii ay soo martay. Axdiga Hore dhexdiisa waxyaalahan ka shaqaynayay ayaa haddaba Axdiga Cusubi waxa uu ku sheegay malaa’ig sharlayaal ah (Shaydaan) sida aan ka heli karno 2 Korintos 11:3; Muujintii 12:9.

Haddaba, asalka sharka la magacaabay waxa adag amaba aan caqli gal ahayn, in lagu dhex qeexo Axdiga Hore. Sabab ka mida arrintan ayaa waxay ahayd Israa’iiliyiinta (1 Boqorradii 22:20-22; Wacdiyaha 7:14; Ishacyaah 45:7; Caamoos 3:6). Waxwalbana waxa lala xidhiidhin jira oo lagu Ilaah oo waxwalba maamula (Ishacyaah 43:11; 44:6,8,24; 45:5-6, 14, 18, 21, 22).

Ilaaha macluumaadka suurto galka ahina waxay diiradda saarayaan (1) Ayuub 1-2 halkaasoo shaydaanku uu yahay mid ka mida “wiilasha Ilaah” (malaa’igaha) ama (2) Ishacyaah 14; Yexesqeel 28 halkaasoo meel ku dhow boqortaayada bari tusaale ahaan loogu adeegsan jiray faanka Shaydkaanka (1Timoteyos 3:6). Waxaan haddaba fikiro isku dhex jira ka haystaa arrintan. Yexesqeel waxa uu tusaale ahaan u adeegsanayaa Beer Ceeden mana aha boqor Turos oo Shaydaanka keli ahaan lagu tilmaamayo (Yexesqeel 28:12-16), laakiinse waxa sidoo kale loo adeegsaday boqorka Masar oo lagasoo qaaday sida Geedka Garashada Xumaanta yoo Wanaagga (Yexesqeel 31). Si kastaba ha ahaatee Ishacyaah 14, gaar ahaan aayadaha 12-14, waxay u muuqdaan iyaga oo tilmaamaya malag caasinnimo sameeyay isagoo isla wayn. Haddaba, haddii uu rabo inuu inoo muujiyo dabeecadda gaarka ah ee Shaydaanka, waxay tahani middani arrin aad u maldahan.

Kitaabka uu qoray Alfred Edersheim (*The Life and Times of Jesus Messiah*, vol. 2, XIII [pp. 748-763] iyo XVI [pp. 770-776]) ayaa waxay leeyihiin rabbaaniyiinta Yuhuudda ahayd waxa saamayn ku yeeshay waxyaalihii Aasiyaanku aaminsanayeen. Haddaba, rabbaaniyiintu maaha ilo xaqiiqo oo arrintan loogu noqon karo. Ciise Masiixna waxa uu wuxuu ahaa mid kasoo jeeday waxbaristii ay ku samayn jireen Sinagooga. Waxaan filayaa fikiri rabbaaniyiintu ka haysteen dhexdhexaadinta malaa’igta iyo kasoo horjeedsashada Sharciga Muuse lagu siiyay Buur Siinay dusheedu, inuu furay fikirka ah cadowga malaa’igta ah ee Ilaah iyo kan aadanaha. Labadii ilaah ee uugu sarreeyay ilaahyada Iraaniyiinta (Zoroastraian) labonimada, *Ahkiman* iyo *Ormaza*, khayrka iyo sharka, ayaa saamayn ku yeeshay Yuhuudda kana dhigay inay sameeyaan labonimo xaddidan oo ah Yahweh iyho Shaydaanka.

Hubaashii Axdiga Cusub ayaa wuxuu isna ka waramayaa sharka, laakiin maaha sidii ay rabbaaniyiintu ka amaansanaayeen si lamid ah. tusaalaha ugu wanaagsan ee loo soo qaadan karo farqiga u dhexeeyaana waa “dagaal samada dhexdeeda ah.” dhicista Shaydaankuna waa caqligal, laakiin sigaara looma sheegin. Xitaa waxyaalaha laga sheegay waa kuwo dedan (Muujintii 12:4,7,12-23). Inkasta oo haddaba Shaydaanka laga adkaaday oo loo soo mustaafuriyay dhulka, ilaa hadda wuxuu u hawl gala isagoo ah adeegaha Yahweh (Matayos 4:1; Luukos 22:31-32; 1 Korintos 5:5; 1 Timoteyos 1:20).

Waa inaan haddaba xad u yeelno u fiirsashadeenna ku aaddan mawduucan. Waxa jirta jarribaad shaqsi ahaaneed iyo mid sharka xaggiisa ah, laakiinse marwalba waxa jira hal Ilaah oo aadanahuna iyaga ayaa ah kuwa ka masuulka ah waxa ay dooranayaan. Waxa jira loollan xagga ruuxa ah ka hor badbaadada iyo dabadeedba, sidaasi darteedna guushu waxay ku iman kartaa kuna sugnaan kartaa marka la raaco Ilaah isku muujiyay Saddexmidnimada. Sharkana waa laga adkaaday waxanu noqon doonaa mid meesha laga saaro!

▣ **“dibaddaa lagu tuuri doonaa”** Kani waa fal mustaqbaleed aan toosnayn ama maldahan. Qorniinnadu ma caddaynayaan waqtiga dhabta ama saxda ah ee uu shayddaanku ka soo dhacay jannada. Waxaa dhacda in Shayddaanka looga hadlayo Ishacyaah 14 iyo Yexeseel 28 si heer hoose ah. Qoraallada nebiyadu waxa ay middan uga hadlayaan in ay ku tilmaamaanboqorrada isla weyn sida Baabiloon iyo Tarax. Dembigooda iyo kibir badnaantooda ayaa fal shayddaan (cf. Ishacyaah. 14:12, 15; Yexesqeel. 28:16). Arrintu si kastaba ha ahaatee, Ciise waxa uu sheegay in uu Shayddaanka arkay xilligii hawshii socdaalkii toddobaatanka (cf. Luukos 10:18).

Waxaa jira horumar uu samaynayey Shayddaanku waqtigii Axdigii Hore. Asalkii Shayddaanku waxa uu ahaa malaa’ig Ilaah u adeegta, laakiin islaweynidiisa awgeed ayuu u noqday cadaw Ilaah. Falanqaynta ugu fiican ee ku saabsan maaddadan iska imanaysa waxa ay ku jirtaa A. B. Davidson buuggiisa *Old Testament Theology* bogagga 300-306.

MAWDUUC GAAR AH: DAGAALKA JANNADA (Waxaa laga soo qaaday tafsiirkayga ku saabsan Muujintii)

Waxaa jiray falanqayn badan oo ah taariikhda waqtiga murankan Ciise waxa uu u muuqdaa in uu tan ku sheegayo Luukos 10:18 iyo Yooxanaa 12:31. Laakiin in la isku dayo in waqti loo sameeyo dhacdadan xagga soo yaalka taariikhda aad ayey u adag tahay.

1. Ka hor Bilowgii 1:1 (uunka ka hor)
2. In u dhexaysa Bilowgii 1:1 iyo 1:2 (aragti ah waqti intaas u dhexeeya)
3. Axdigi Hore dhexdiisa oo ka dambaysa Ayuub 1-2 (Shayddaanka oo ku jira jannada)
4. Axdigi Hore dhexdiisa oo ka dambaysa I Boqorrada 22:21 (Shayddaanka oo talo samaawi ah ku jira)
5. Axdigi Hore dhexdiisa oo ka dambaysa Sakariyaah 3 (Shayddaanka oo ku jira jannada)
6. Axdigii Hore dhexdiisa sida ku jirta Ishacyaah 14:12; Yexesqeel 28:15 iyo Heenook 29:4-5 (boqorradii asalka ahaa oo la cambaareeyay)
7. Axdiga Cusub dhexdiisa oo ka dambaysa markii ciise la jirrabay (cf. Matayos 4)
8. Axdiga Cusub dhexdiisa intii lagu guda jiray hawshii toddobaatanka (oo la arkay Shayddaan samada ka soo dhacaya cf. Luukos 10:18)
9. Axdiga Cusub dhexdiisa oo ka dambaysa markii guusha lagu soo galay Yerusaaalem (madaxii dunida oo la eryay, cf. Yooxanaa 12:31)
10. Axdiga Cusub dhexdiisa oo ka dambaysa Ciise sarakiciddiisii iyo aadistiisii samada (cf. Efesos 4:8. Kolsay 2:15)
11. Waqtiga kama dambaysta (cf. Muujintii 12:7, sida macquulka ah Shayddaan samada ka soo dabayshaday isagoo raadinaya Wiilka)

Tan waxaan u aragnaa oo qura dagaalka u dhexeeya Ilaah iyo kuwa xumaha martida u ah; iskudhacan waxa uu dhammaynayaa masduulaaga iyo kuwa martida u qah. Sida ku jirta Muujintii 20 iyaga waa la raray oo la takooray!

12:32 “Aniguna haddii kor layga qaado” Tani waa jumlad xaaladeed heerka saddexaad ah oo macnaheedu yahay ficil suuragal ah. Ereygani waxa uu noqon karaa

1. Kor u qaadis (cf. 3:14)
2. Iskutallaabta lagu qodbo (cf. 8:28)
3. Ammaanmid (cf. Falimaha Rasuullada 2:33; 5:31)
4. Si sare loo ammaanay (cf. Filiboy 2:9)

Tani waa tilmaan dhinacyo badan eegaysa (labo ujeedo) oo tilmaanaysa qaabka Yooxanaa Injiilkiisa.

▣ **“dhammaan xaggaygaan u soo jiidi doonaa.”** Waxaa laga yaabaa in middani ay masaal u tahay YHWH axdigiisa jacaylka leh ee Israa’iil sida ku jirta Yeremyaah 31:3 taasoo dabcan ah farriinta ku aaddan “axdiga cusub” (cf. Jer. 31:31-34). God Ilaah wuxuu dadka ku dhiirri geliyaa jacayl iyo ficil u aaddan iyaga. . Tilmaantan waxaa sidoo kale lagu dhex adeegsaday Yooxanaa 6:44 waxaana sharraxaad looga dhex bixiyey 6:65. Halkan ereyga “dhammaan” waa ballanta casuumaadda ee madaxfurashada caalamka (cf. Bilowgii. 3:15; 12:3; Baxniintii. 19:5; Ishacyaah. 2:2-4; Yooxanaa 1:9, 12, 29; 3:16; 4:42; 10:16; I Timoteyos 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; II Butros. 3:9; I Yooxanaa 2:2; 4:14)!

Waxaa jirta kala duwanaan toos ah oo ku jirta weedhan. Ereyga “dhammaan” waxa uu noqon karaa lab, taasoo ahayd in loo tarjumo “nimanka dhammaantoodtaasoo laga dhex heli karo Qorniinnadii Hore ee Giriigga ee P75 (VID), !2, B, L, iyo W, halka duunyada oo loo tarjumi lahaa “sheeyada dhammaantood,” laga helayo halkan. P66 iyo !. dhexdoodana haddii ay sheeyo noqon lahaayeen waxa ay ka hadli lahayd madaxfurashada uu Masiixu madaxfurtay caalamka oo la oo la mid ah sida ku jirta Kolosay. 1:16-17, oo soo saari lahayd caqiidada Gnostic-ga oo ay caddayn u tahay I Yooxanaa. UBS4 waxa uu sheegayaa LAB kuna qiimaynaya heerka “B” oo ah (ugu dhawaan wax run ah).

12:33 “Wuxuu waxaas u yidhi inuu tuso siduu u dhiman doono.” tani waa faallo kale oo uu bixinayo Yooxanaa, waxaanay la xidhiidhaa Sharciga Kunoqoshadiisa 21:23 halkaasoo qodbitaanka lagu tilmaamay habaar ka yimid Ilaah xaggiisa. Sababtan aawadeed ayaan hoggaamiyayaasha diintu u rabeen Ciise inuu ku dhinto isku tallaabta korkeeda oon ahayn in dhagax lagu dilo. Ciise waxa uu inaga inaga korqaaday inkaartii sharciga (Galatiya 3:13).

12:34 “dadkii badnaa waxay ugu jawaabeen, ..in Masiixu weligiis jiri doono” waxa laga yaabaa in middani ay tilmaamayso Sabuurka. 89:4, 29, 35-37. Axdiga Hore waxa uu filayay imaatinka Masiixa kaasi oo nabad gelyo ka asaasi doonay Falastiin (cf. Sabuurka. 110:4; Ishacyaah. 9:7; Yexesqeel. 37:25 iyo Daanyeel. 7:14). Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:58.

▣ **“Wiilka Aadanuha”** dadkii badnaa (eeg Fahanka Macnaha Guud, C) waxay maqleen Ciise waxbaristiisii (suurto gal sida ku sugan aayadaha 23-24 maga iyo aayadaha 30-32 falka “kor loo qaado”) maxaa yeelay waxay arkeen sidii gaarka u ahaa. Halkani waa meesha kelya ee kuwa kale adeegsadeen. May ahayn magac ama wax la xidhiidha Masiixa oo Yuhuudda lagu dhex yaqaanay.

12:35 “Socda intaad nuurka haysataan” Ciise waxa uu dhegaystayaashiisa kula doodayaa inay ereyadiisa si degdega uga jawaabaan. Wakhtigiisii uu dhulka joogay waxa uu ahaa mid xadaysan, waxaanu galayay usbuucii ugu danbeeyay joogitaankiisa dhulka. Waxa uu sii sheegay saacadda iman doonta (aayadda 23).

Macnaha erayadani (sida ay ugu badan yihiin Yooxanaa) waxa sitaan dhacdo taariikh ahaaneed. Waxa Ciise yidhi waa u run qof wal oo maqlaya Injiilka (masaalka carrada).

Tani waa adeegsiga tusaale ahaaneed ee “socda” isagoo ah qaab nololeed (cf. Efesos. 4:1, 17; 5:2, 15). Waa fal wakhti xaadirka jooga oo amar ah, kaasi oo Ciise uu kusii xoojinayo xidhiidh joogto ah iyo xernimo, aan ahayn go’aanka ugu horreeya oo keliya (aayadaha 44-46).

12:36 Ciise oo ah nuurka dunidu waa mawduuca in badan soo noqnoqonaya marka la eego Injiilka Yooxanaa (cf. 1:4, 5, 7, 8, 9; 3:19, 20, 21; 5:35; 8:12; 9:5; 11:9, 10; 12:35, 36, 46). Mugdiga iyo nuurku waa labo xaqiiqo oo ruuxi ah isla markaana iskasoo horjeeda marka la eego Qoraallada Xikmadda iyo Qoraallada laga helay Badda Dhimatay.

NASB (UPDATED) TEXT: 12:36b-43

^{36b}Waxyaalahaas Ciise ayaa ku hadlay, markaasuu ka tegey oo ka dhuuntay iyaga. ³⁷laakiin in kastuu calaamooyin badan ku sameeyey hortooda, weli ma ay rumaysan isaga; ³⁸inuu noqdo hadalka nebi Isayos oo uu ku hadlay, Rabbiyow, yaa warkayagii rumaystay, Oo yaa gacantii Rabbiga loo muujiyey? ³⁹Sidaa aawadeed ayay rumaysan kari waayeen, waayo, Isayos ayaa haddana yidhi, ⁴⁰Wuu indhatiray, qalbigoodana ayuu engejiyey. Si aanay indhahooda wax ugu arkin. oo aanay qalbigoodana wax ugu garan, Oo aanay u soo noqon, Oo aanan u bogsiiin. ⁴¹Waxyaalahaas Isayos ayaa yidhi, maxaa yeelay, ammaantiisuu arkay, wuuna ka hadlay isaga. ⁴²Hase ahaatee qaar badan oo taliyayaasha ka mid

12:37 Waa faallo murugo leh. Indho la’aanta ruux ahaaneed waa wax xun (2 Korintos 4:4). Aayaddani waxa ay denbiga aan cudur daarka lahayn (eeg Mawduuca Gaarka ah 5:21).

12:38 “hadalka nebi Isayos” waa xigasho ku saabsan adeegaha silcaya sida ku sugan Ishacyaah 53:1.

12:39-40 aayadahani way adagiyihiin. Ilaah ma isagaa dadka qalbiyadooda adkeeya si aanay u jawaabin? Waxa faalladayda aan kasoo qaatay Ishacyaah 6:9-10 iyo Rooma 11:7 (eeg www.freebiblecommentary.org).

▣ **Ishacyaah 6:9-10** YHYH waxa uu ku muujinayaa Ishacyaah adeeggiisa, sidoo kalena waxa uu Ishacyaah u muujinayaa jawaabta ay farriintan ka qaadan doonaan Yahuudiya.

1. tag, aayadda 9, BDB 229, KB, *Qal* amar.
2. sheeg, aayadda 9, BDB 55, KB, *Qal* ebyan.
3. dhegayso, aayadda 9, *Qal* amar iyo *Qal* dhammaadka aan lahayn ee BDB 1033, KB 1570
4. laakiin ha ogaysiin, aayadda. 9, BDB 106, KB 122, *Qal* aan ebyan ahayn lana adeegsaday, 1:3; 5:21; 10:13; 29:14
5. eeg, *Qal* amar iyo *Qal* aan dhammaadka lahayn ee BDB 906, KB 1157
6. laakiin ha fahmin, aayadda. 9, BDB 393, KB 380, *Qal* aan ebyan ahayn lana adeegsaday
7. qalbiyada dadkan qallafi (lit. “buuran”), aayadda. 10, BDB 1031, KB 1566, *Hiphil* amar.
8. their ears dull, v. 10, BDB 457, KB 455, *Hiphil* IMPERATIVE

9. dhegehooduna dhib wax ku maqla, aayadda. 10, BDB 1044, KB 1612, *Hiphil* amar.

Amarradan waxa la socda natiijo (saddex fal oon buuxin, “eeg,” “maqal,” iyo “rumayso”). Ilaah waxa uu ogyahay (isagoo hore usii og ama qalbiyadooda adkaynaya) in aanay ka jawaab celin doonay lana badbaadin doonin.

1. towbad keenkooda yaraaday, BDB 996, KB 1427, *Qal* ebyan la diiday.

2. caafimaadintooda yaraatay, BDB 950, KB 1272, *Qal* ebyan la diiday.

Ishacyaah wuu wacdin doonaa iyadoo inkasta oo qaar ka jawaab celin doonaan, dadkiisa badankoodu kama jawaab celin doonaan (cf. Rooma. 1:24, 26, 28; Efesos. 4:19) ama ma awoodi doonaan inay ka jawaab celiyaan (cf. Ishacyaah. 29:9, 10; Sharciga Kunoqoshadiisa. 29:4; Matayos. 13:13; Rooma. 11:8)! Ishacyaah halkan wacdiye kuma aha, but laakiin waa nebi axdiga addeecis la'aanta/cawaaqib xumada (cf. Matayos. 13:13; Markos 4:12; Luukos 8:10). Farriintiisa rajadu waxay u ahaatay mustaqbalka aan maanta ahayn.

Rooma 11:7 “intii kalena waa la engejiyey” tani waa weedh sarbeeb ah (cf. II Korintos 3:14). Tilmaantu waxay tahay in Ilaah engejiyey iyaga (cf. aayadaha 8-10). Macnaha qallafintu waa midka sharka leh (cf. II Korintos 4:4). “Hardened” (*Poroo*) “engejin” waa erey xagga dawada la xidhiidha oo macnahiisu yahay indho beeline (Rooma 11:25; II Korintos 3:14; Efesos 4:18). Isla ereygan waxaa lagu adeegsaday Maarkos 6:52. Waa ereyga Giriig ka duwan kan ku jira 9:18 (*skleruno*) oo naxariista cagsi ama liddi ku ah (cf. Cibraaniyada 3:8, 15; 4:7).

Aayaddani waa bayaan ah waxayna soo koobaysaa 11:1-6. Intii la doortay waa ay rumeeyeen, laakiin kuwii aan la dooran waa la engejiyey. Arrintu si kastaba ha ahaatee, aayaddan si gooni ah looma qorin hab fiqi ahaaneed. Waxa ay qayb ka ahayd dood fiqi ahaaneed oo xasishay. Waxaa jirta xiisad u dhexaysa runta sida cad loogu dhex sheegay aayaddan iyo casumaadaha caalamiga ah ee cutubka 10. Wax cajiib ah ayaa halkan ku jira. Laakiin xalku ma aha in la diido ama la yareeyo haddii lab-labayni ku jirto ama wax wada socda tahay midba.

12:39 “Sidaa aawadeed ayay rumaysan kari waayeen” waa fal aan ebyan ahayn waxna tusmaynaya iyo ficil amar ah oo wakhti xaadirka jooga lana garanayo. May awoodin inay kusii socdaan rumaysadka ku sugan xidhiidhka lala yeesho Ciise, waxaana soo jiitay mucjisooyinkiisii, laakiinse umay suurto gelinin inay rumaystaan oo helaan badbaadada lagu helayo Ciise oo ah Masiixa. eeg firada 8:31-59.

▣ **“waayo, Isayos ayaa haddana yidhi”** Ishacyaah 6:10; 43:8 waxa ay tilmaamayaan qalbiyada Yuhuudda oo adkaa marka loo eego farriintii Ishacyaah (cf. Yeremyaah 5:21; Yexesqeel. 12:2; Sharciga Kunoqoshadiisa. 29:2-4).

12:40 “qalbi” eeg Mawduucan Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: QALBIGA

Erayga *kardia* oo ah qalbiga ayaa waxa lagu adeegsaday Axdiga Cusub, xagga luqadda Cibraanigana waxa la yidhaahdaa *leb*. Waxa siyaabo kala duwan loogu dhex adeegsaday (Bauer, Arndt, Gingrich iyo Danker, *A Greek English Lexicon*, pp. 403-404).

1. Xarunta nolosha qofka (Falimaha Rasuullada 14:17; 2 Korintos 3:2-3; Yacquub 5:5)
2. Xarunta nolosha ruuxiga ah
 - a. Ilaah wuxuu ogyahay qalbiga (Luukos 16:15; Rooma 8:27; 1 Korintos 14:25; 1 Tesoloniika 2:4; Muujintii 2:23).
 - b. Waxa loo adeegsaday nolosha ruuxiga ah ee aadanaha (Matayos 15:18-19; 18:35; Rooma 6:17; 1 Timoteyos 1:5; 2 Timoteyos 2:22; 1 Butros 1:22).
3. Xarunta fikirka nolosha (Matayos 13:15; 24:48; Falimaha Rasuullada 7:23; 16:14; 28:27; Rooma 1:21; 10:6; 16:18; 2 Korintos 4:6; Efesos 1:18; 4:18; Yacquub 1:26; 2 Butros 1:19; Muujintii 18:7; qalbigu wuxuu la xidhiidhaa maskaxda 2 Korintos 3:14-15 iyo Filiboy 4:7).
4. Xarunta doonitaanka (Falimaha Rasuullada 5:4; 11:23; 1 Korintos 4:5; 7:37; 2 Korintos 9:7)
5. Xarunta caadifadaha (Matayos 5:28; Falimaha Rasuullada 2:26,37; 7:54; 21:13; Rooma 1:24; 2 Korintos 2:4; 7:3; Efesos 6:22; Filiboy 1:7).
6. Meel u gaara shaqooyinka Ruuxa (Rooma 5:5; 2 Korintos 1:22; Galatiya 4:6(Masiixu qalbiyadeennu ku jiraa Efesos 3:17).
7. Waa xarunta ka tarjumaysa gebi ahaanba qofka (Matayos 22:37, oo kasoo qaadanaya Shariciga ku

noqoshadiisa 6:5). Fikirka iyo iyo camalku waxa ay ka tarjumayaa waxa qofka ku jira qalbigiisa. Meelo ka mida Axdiga Hore oo lagu isticmaalay eraygan

- a. Bilowgii 6:6; 8:21 “Rabbigu qalbiguu ka qoomamooday,” sidoo kale u fiirso Hoosheeca 11:8-9.
- b. Sharciga Kunoqoshadiisa 4:29; 6:5, “qalbigaaga iyo naftaada oo dhan”
- c. Sharciga Kunoqoshadiisa 10:16 “qalbiga aan gudnayn” iyo Rooma 2:29
- d. Yexesqeel 18:31-32 “qalbi cusub”
- e. Yexesqeel 36:26, “qalbi cusub” oo uu kasoo horjeedo “qalbi engegani”

12:41 “Waxyaalahaas Isayos ayaa yidhi, maxaa yeelay, ammaantiisuu arkay” waxa ay adkaynasaa in nebiyadii Axdiga Hore ay kusii baraarugeen Masiixa (Luukos 24:27). Eeg fiirada ku saabsan “ammaan” ee 1:14.

12:42 “Hase ahaatee qaar badan oo taliyayaasha ka mid ahaa way rumaysteen,” Ciise Marriintiisu waxay dhashay midho (aayadda 11; Falimaha Rasuullada 6:7). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23.

▣ **“ma ay qiran Isaga”** eeg Mawduuca Gaarka ah 9:22-23.

▣ **“si aan sunagogga looga saarin”** (9:22; 16:2).

12:43 waxa ay tilmaamaysaa in rumaysadka runta ahi uu noqon karo mid taag yar oo cabsada. Rumaysadku waxa uu leeyahay heerar dhowr ah marka loo eego qoraallada Yooxanaa, heer kastaana maaha mid badbaadada inoo hoggaaminaya.

NASB (UPDATED) TEXT: 12:44-50

⁴⁴Ciise ayaa ku dhawaaqay oo yidhi, Kii i rumaystaa, ima rumaysto, wuxuuse rumaystaa kan i soo diray. ⁴⁵Kii i arkaana, wuxuu arkaa kan i soo diray. ⁴⁶Waxaan dunida u imid inaan nuur u ahaado, in mid kasta oo i rumaystaa uusan gudcurka ku sii jirin. ⁴⁷Nin uun hadduu erayadayda maqlo oo uusan xajin, xukumi maayo, waayo, uma iman inaan dunida xukumo, waxaanse u imid inaan dunida badbaadiyo. ⁴⁸Kii i diida oo aan erayadayda aqbalin, wuxuu haystaa mid xukuma. Hadalkaan ku hadlay baa xukumi doona isaga maalinta u dambaysa. ⁴⁹Waayo, anigu amarkayga kuma hadlin, laakiinse Aabbihii i soo diray isagaa i amray waxaan idhaahdo iyo waxaan ku hadloba. ⁵⁰Oo waanan garanayaa inuu amarkiisu yahay nolosha weligeed ah. Sidaa daraaddeed waxaan ku hadlayaa, sidii Aabbuhu igu yidhi, sidaasaan ku hadlayaa.

12:44 “Kii i rumaystaa, ima rumaysto, wuxuuse rumaystaa kan i soo diray” ujeedada ugu danbaysa ee laga leeyahay rumaysadku waa in la rumaysto Aabbaha (cf. I Korintos. 15:25-27). Mawduucani in badan ayuu soo noqnoqonayaa (cf. Matayos. 10:40; Yooxanaa 5:24). In la garto Wiilku waxay ka dhigantahay Aabbaha oo la gartay (cf. I John 5:10-12).

12:45 Ilaah waa sidee? Ciise oo la arkaa waa Aabbaha oo la arkay (14:7-10).

12:46 dunidu mugdibay ku jirtay laga soo bilaabo Bilowgii 3 (cf. Bilowgii. 6:5, 11-12; 8:21; Sabuurka. 14:3; Ishacyaah. 53:6; Rooma. 3:9-23).

12:47 “Nin uun hadduu erayadayda maqlo oo uusan xajin” waa weedh shuruudeed heerka saddexaad ah oo faa’idaynasa suurta galnimada xaqiijinta. Addeecitaanka joogtada ahi waxa uu calaamad u yahay xidhiidhka shakhsi ahaaneed ee daa’imiska ah. ballan qaadku (eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 5:13) waxa lagu aasaasay nolol is bedbedelaysa oo toosnaanteedu tahay addeecitaanka iyo dadaalitaan (eeg Mawduuca Gaarka ah 8:31, kitaabyada Yacquub iyo 1 Yooxanaa).

12:47-48 “waayo, uma iman inaan dunida xukumo, waxaanse u imid inaan dunida badbaadiyo.” Ciise ugu horrayn wuxuu u yimid inuu badbaadiyo dunida, laakiinse imaatinkiisu dadka waxa uu ku qasbayaa inay

aqbalaan ama diidaan. Haddii ay diidaan, iyaga ayaa is xukumay (eeg Mawduuca Gaarka ah 8:31, Yooxanaa 3:17-21).

12:49-50 Ciise waxa uu ku hadlay awoodda Aabbaha oon ahayn tiisa.

12:50

NASB, NKJV “amarkiisu yahay nolosha weligeed ah”

NRSV, TEV,

NET

“amarkiisu wuxuu keenaa nolosha weligeed ah”

NJB

“amarradiisa macnohoodu waa nolosha weligeed ah”

REB

“amarradiisu waa nolosha weligeed ah”

NIV

“amarkiisu wuxuu u hoggaamiyaa nolosha weligeed ah”

Net (fiiro gaara)

“natiijada amarradiisu waa nolosha weligeed ah”

Ikhtiyaarka hore waa macnaha qoraalka Giriiggu toosinayo. Kuwa kalena waxay isku dayayaan inay macneeyaan oo fasiraan.

NASB waxa uu la mid yahay Yooxanaa 6:68, halka Michael Magill kitaabkiisa *NT TransLine* uu kala mid yahay Yooxanaa 17:8. Jerome Biblical Commentary (p. 451) ayaa isna la mida Yooxanaa 10:18. Waxa cad in erayadani xambaarsan yihiin macnayaal dhowr ah.

Yooxanaa waxa farqi u dhexeeya jamaca iyo kelida “amar,” mana laha muhiimad macno ahaaneed.

MAWDUUC GAAR AH: ADEEGSIGA “AMAR” EE QORAALLADA YOOXANAA

1. Mar ayaa lagu adeegsaday Sharciga Muuse, Yooxanaa 8:5
2. Ciise uga yimid Aabbaha
 - a. Maamulista dhimashadiisa badbaada keenaysa, Yooxanaa 10:18; 12:49-50; 14:31
 - b. Duniidu waxay ogaan doontaa jacaylka Ciise u qabo Aabbaha, Yooxanaa 14:31
 - c. Ciise wuxuu addeecay amarka Aabbaha, Yooxanaa 15:10
3. Ka timid Ciise una ahaatay rumaystayaasha
 - a. Ku dhex jira jacaylkiisa, Yooxanaa 14:15; 15:10
 - b. Inay is jeclaadaan, sidii isba iyaga u jeclaaday, Yooxanaa 13:34; 15:12,17; I Yooxanaa 2:7-8; 3:11,23; 4:7,21; II Yooxanaa 5
 - c. Dhowraan amarradiisa, Yooxanaa 14:15; 15:10,14; I Yooxanaa 2:3,4; 3:22,24; 5:1-3; II Yooxanaa 6
4. Rumaystayaasha uga yimid Aabbaha
 - a. Rumaysta Ciise, I Yooxanaa 3:23 (cf. Yooxanaa 6:29)
 - b. Is jeclaada, I Yooxanaa 3:23

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay Maryantii ahayd Laasaros walaashii, ay Ciise caghiisa ugu subagtay?
2. Maxay injiillada Matayos, Markos, iyo Yooxanaa ay ugu kala duwan yihiin faa'faahinta dhacdadadan?
3. Maxay tahay muhiimadda ku jirta Ciise oo dadkii badnaa kusoo dhoweeyeen caleemo qoyan, iyo wax kasoo xigashada Sabuurka 118?
4. Muxuu Ciise ugu farxay Giriigta oo ka dalbatay inuu la hadlo iyaga?
5. Maxay nafta Ciise u murugootay?
6. Sharraxaad ka bixi sababta Yooxanaa uu erayga “rumays” ugu adeegsanayo heerar dhowr ah.

YOOXANAA 13

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Cago u dhaqastii xerta	Macallinkii wuxuu noqday Adeege	Cashadii ugu dambaysay	Ciise xertiisu cagaha u dhaqay	Cago dhaqistii
13:1-11	13:1-11	13:1	13:1 13:2-6 13:7 13:8a 13:8b 13:9 13:10-11	13:1 13:2-5 13:6-11
13:12-20	Inana waa inaan adeegno 13:12-30	13:12-20	13:12-17 13:18-20	13:12-16 13:17-20
Ciise wuu sii sheegay gacan gelintiisa		13:21-30	Ciise wuu sii sheegay gacan gelintiisa	Khiyaanadii Yuudas waa lasii sheegay
13:21-30			13:21 13:22-24 13:25 13:26-29 13:30	13:21-30
Amarka Cusub	Amarka Cusub		Amarka Cusub	Khudbada macasalaamayn ah
13:31-35	13:31-35	13:31-35	13:31-35	13:31-35
Dafiritaankii Butros waa lasii sheegay	Ciise wuu sii sheegay dafirista Butros		Ciise wuu sii sheegay dafirista Butros	
13:36-38	13:36-38	13:36-38	13:36a 13:36b 13:37 13:38	3:36-38

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEADADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 13:1-38

- A. Injiilka Yooxanaa muujisooyinkii Ciise wuxuu kusoo gebogabaynayaa cutubka 12. Cutubka 13 na wuxuu ku bilaabmayaa usbuucii ugu danbeeyay.
- B. Kitaabka NASB wuxuu samaynayaa faallo xiiso leh oo ku saabsan “magaca Giriigga ee *agapē* (‘jacayl’) iyo falka *agapaō* (‘jacel’) isagoo sideed jeer oo keliya kusoo arooraday cutubyada 1-12 laakiinse kusoo arooraya 31 jeer cutubyada 13-17.”
- C. Yooxanaa ma qorayo Cashada Rabbiga (Eucharist) sida injiillada kale samaynaayan. Waxa keliya oo uu ka hadlayaa wada sheekaysigtii habeenkaas socday (cutubyada 13-17, oo muhiim ku dhex ah Injiilka Yooxanaa. Sidaas darteedna waxay si xooggan u muujinaysa shaqsiyadda iyo shaqada Ciise). Qaar ayaa u arka in arrintan si kas ah looga tegay iyadoo la isku dayayo in muhiimaddeeda laga yareeyo kaniisaddii hore. Haddaba, Yooxanaa marnaba wax adag kama dhigayo baabtiisa Ciise iyo Cashada Rabbiga.
- D. Macnaha taariikh ahaaneed ee Yooxanaa 13 waxa laga arki karaa Luukos 22:24. Xertuna ilaa hadda waxay ka hadlayeen kan ahaa midka ugu wayn.
- E. Ka hadalka cutubyada 13-17 iyadoo ay joogeen guri ku yaalla Yerusaaalem (ama waxa suurto gala cutubyada 15-17 maray u socdeen Getsamane 14:31), waxa suurto gal ah in Yooxanaa uu ka dhigayo guri markii Ciise uu gacan geliyay Yuudas.
- F. Markii Ciise xertiisa lugaha u maydhay waxa ay u muuqataa in laga lahaa labo ujeedo
 1. aayadaha 6-11 oo sii sheegaya shaqada uu inaga darteen ugu qaban doono isku tallaabta
 2. aayadaha 12-20 oo ah cashar khuseeya is hoosaysiinta (sida uu iftiimanayo Luukos 22:24).

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 13:1-11

¹Iidda Kormaridda horteed Ciise wuxuu garanayay inay timid saacaddiisii uu dunidan ka tegi lahaa ilaa Aabbaha, oo siduu u jeclaa kuwiisii dunida joogay, ayuu u jeclaa tan iyo dhammaadka. ²Ibliiska ayaa markii hore qalbiga Yuudas Iskariyot ina Simoon geliyey inuu Ciise gacan geliyo. ³Oo wakhtiga cashada Ciise oo garanaya in Aabbuhu wax walba gacanta u geliyey iyo inuu Ilaah ka yimid oo Ilaah ku noqonayo, ⁴ayuu cashadii ka kacay oo dharkii iska dhigay, tuwaalna wuu qaatay oo guntaday. ⁵Markaasuu biyo weel ku shubay oo bilaabay inuu xertiisa cagaha u maydho oo ku tirtiro tuwaalkii uu guntanaa. ⁶Wuxuu haddaba u yimid Simoon Butros. Kaasaa ku yidhi, Sayidow, ma adaa cagaha ii maydhaya? ⁷Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku yidhi, Waxaan samaynaya, garan maysid imminka, laakiinse dabadeed waad garan doontaa. ⁸Butros ayaa ku yidhi, Weligaa cagaha ii maydhi maysid. Ciise wuxuu ugu jawaabay, Haddaanan kuu maydhin, qayb iguma lihid. ⁹Markaasaa Simoon Butros ku yidhi, Sayidow, cagaha keliya ha ii maydhin, laakiin gacmaha iyo madaxanaa ii maydh. ¹⁰Ciise ayaa ku yidhi, Kii maydhni uma baahna inuu maydho caghiisa mooyaane, laakiin waa wada nadiifsan yahay, idinkuna waa nadiifsan tihiin, laakiin dhammaantiin ma aha. ¹¹Waayo, wuu garanayay kii gacan gelin lahaa. Sidaa daraaddeed ayuu u yidhi, Dhammaantiin ma wada nadiifsanidin.

13:1 “Iidda Kormaridda horteed” Yooxanaa iyo Injiillada kale waxay isku khilaafayaan haddii ay ahayd maalintii ka horraysay Kormaridda iyo haddii ay ahayd maalintii Kormaridda lafteeda. Labaduba waxay sheegayaan oo cuntada ku darayaan Khamiistii iyo maalintii qodbitaanka ee Jimcihii (19:31; Markos 15:43; Luukos 23:54). Cuntadan Kormaristu waxa lagu xusi jiray markii Israa’iil kasoo samata baxeen Masar (Baxniintii 12). Yooxanaa waxa uu sheegayaa inay ahayd maalintii ka horraysay Kormaridda (18:28; 19:14, 31, 42).

Waxa suurto gal ah in dadka Esseyiintu ay adeegsadeen tirsi taariikheedyo kala duwan (tirsiga ku sugan kitaabada Jubilees iyo Enoch, iyaga oo tusinaya diidmadooda ku waajahan wadaadnimada), kuwaasoo maalin hore u dhiga Kormaridda.

Kitaabka Jerome Biblical Commentary ayaa wuxuu kusoo koobayaa (p. 451) isaga oo u arka “maalin kahor” ta Yooxanaa inay tahay sax iyadoo Injiillada kalena sheegayaan cunnada calaamadda u ah Kormaridda. Haddaba, waa inaan markasta xasuusnaano Injiillada oon ahayn waxay ay keensadeen ama saameen ku sameeyeen reer galbeedku. Taariikhda siyaabo kala duwan ayaa loo qoraa, mana aha inay tahay sax ama qalada, ama been ama run. Ka hadalka ugu wanaagsan ee taariikhda iyo Injiillada waxa ka samaynaya Godon Fee iyo Douglas Stuart, *How To Read the Bible For All Its Worth*, pp. 89-126.

▣ **“Ciise wuxuu garanayay inay timid saacaddiisii”** “garanayay” waa fal ebyan oo shaqaynaya (sida aayadda 3). Ciise xidhiidhkiisa gaarka ah ee uu la leeyahay Aabbaha wuxuu ogsoonaa ugu yaraan markii da’diisu ahayd labo iyo toban jir (Luukos 2:41-51). Imaatinkii Giriigtu inay arkaan isaga sida ku sugan 12:20-23 waxa ay tusinaysay imaatinka saacaddii Ciise dhiman lahaa (2:4; 7:6, 8, 30; 8:20; 12:23, 27; 17:1).

▣ **“uu dunidan ka tegi lahaa ilaa Aabbaha”** Injiilka Yooxanaa waxa uu sii wadaa adkaynta labanimada, kore iyo hoose (aayadda 3). Ciise waxa soo diray (8:42) Aabbaha iminkana wuu soo laaban doonaa. Injiilladu waxay sheegayaan Ciise isaga oo barayay labada casri ee Yuhuuddu taariikh ahaan rumaysnayeen, waana Boqortooyada Ilaah ee timid welina hadhsan.

Waxa jira su’aalo badan oo ku saabsan Injiilka isla markaana ay sheegaan akhristayaasha casriga, laakiin marka dhammaan la sheego qoraalladan Quduuska ahi waxay muujiyaan aragtida kitaabiga ah.

1. Waxa jira Ilaah keliya
2. Abuurkiisa gaarka ah, aadanaha oo leexday caasiyiinna noqday
3. Ilaah waxa uusoo diray badbaadiye (Masiixa)
4. Aadanuhu waa inay ku jawaabaan rumaysad, towbad keen, addeecitaan iyo quduusnaan
5. Waxa jirta awood shakhsi ahaaneed oo dhiirri gelinaysa sharka iyo kasoo horjeedsashada doonista Ilaah
6. Dhammaanba damiirka makhluuqaadka waxa noloshooda xisaabin doona Ilaah

Falka “tegi”(metabainō) qoraallada Yooxanaa dhexdiisa waxay tusinaysaa ka gudbitaanka jiritaanka jidh ahaaneed ee leexashada (da’dii hore ee denbiga iyo caasinimada) iyadoo loo gudbayo casriga cusub ee Ruuxa iyo nolosha weligeed ah (5:24; 13:1; 1 Yooxanaa 3:14; marka laga reebo adeegsigeeda 7:3).

▣ **“oo siduu u jeclaa kuwiisii”** ereyadan Giriig ahaantooda waxa adeegsaday qoraaladii Masaarida (Moulton, Milligan, *The Vocabulary of the Greek New Testament*) iyadoo ah “qaraabo dhow” (Luukos 8:19-21).

▣ **“dunida joogay”** Ciise erayga duni “telos” macnayaal kala duwan ayuu u adeegsanayaa

1. Dunidan aan joogno (1:10; 11:9; 16:21; 17:5, 11, 24; 21:25)
2. Aadanaha (3:16; 7:4; 11:27; 12:19; 14:22; 18:20, 37)
3. Aadanaha caasiyiinta ah (1:10, 29; 3:16-21; 4:42; 6:33; 7:7; 9:39; 12:31; 15:18; 17:25)

Eeg Mawduuca Gaarka ah: Adeegsiga Bawlos ee *Kosmos* 14:17.

▣ **“u jeclaa tan iyo dhammaadka.”** Tani waa erayga Giriigga ah ee “telos” oo macnihiisu yahay ujeedo la dhammayst tiray. Waxa ay sheegaysaa shaqada Ciise ku dulqabtay isku tallaabta ee ah badbaadada aadanaha. Eray sidan la mida ayaa ahayd Ciise hadalkiisii ugu danbeeyay isku tallaabta korkeeda (19:30), “way dhammaatay,” taasi oo aan kaga baranayno qoraallada Masaarida inay tusinayso “si dhammays tiran loo bixiyay”!

13:2 “Oo wakhtiga cashada” waxa jira kala duwanaansho halkan ah oo qoraal gacmeedyada Giriiggu ku kala duwan yihiin. Kala duwanaanshuhu wuxuu koobsanayaa hal xaraf oo ah erayga Giriigga ah.

1. *ginomenou*, fal jooga (wakhtigii cashada), MSS a, B, L, W

2. *genomenou*, wakhti tegay (cashada kadib), MSS P⁶, a², A, D UBS⁴ ka ayaa ikhtiaarka #1 ku bixinaya “B” isagoo ku tiranaya (hubaal).

Waxa loogala jeedi karaa

1. Cashada dabadeed
2. Koobkii koobaad ee mahadnaqa kadib, markii loo baahnaa gacmo dhaqashada
3. Koobkii saddexaad ee mahadnaqa kaddib

MAWDUUC GAAR AH: DALABKA ADEEGGA KORMARIDDA YUHUUDDII QARNIGII KOOBAAD

- a. Tukasho
 - b. Koob nabiid ah
 - c. Gacmaha oo la wada dhaqdo
 - d. Muquurinta geedo qadhaad iyo maraq
 - e. Wanka iyo cuntada muhiimka ah
 - f. Tukasho iyo in marlabaad la muquuriyo geedo iyo maraq
 - g. Koobka labaad ee nabiidka iyadoo carruurtana su’aalo la waydiinayo (Baxniintii 12:26-27)
 - h. Ku heesitaanka Sabuurrada 113-114 iyo tukasho
 - i. Abaabulaha xafladda oo xoogaa lacaga siin jiray marka qofkastaa gacmaha dhaqdo
 - j. Dhammaan waa in la cuno ilaa inta laga dhamaynayo
 - k. Koob saddexaad oo nabiid ah gacmo dhaqashada kaddib
 - l. Ku heesitaanka Sabuurrada 115-118
 - m. Koob afraad oo nabiid ah, oo loogu deeqayo imaatinka Boqortooyada
- Kuwo badan ayaa aaminsan in qabka Cashada Rabbigu ay kusoo dhex aroortay “K.”

▣ **“Ibliiska ayaa markii hore qalbiga Yuudas Iskariyot ina Simoon geliyey inuu Ciise gacan geliyo”** Waa fal ebyan oo tegay. Ciise horaba bilowgii wuu ogsoonaan Yuudas (6:70). Shaydaanku (eeg Mawduuca Gaarka ah 12:31) wakhti badan ayuu jarribayay Yuudas, laakiin aayadda 27 dhexdeeda ayuu shaydaanku gebi ahaantiisaba ku maamulay. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Qalbi 12:40. Sidoo kalena eeg fiirada ku saabsan Yuudas 18:1.

13:3 “Ciise oo garanaya in Aabbuhu wax walba gacanta u geliyey” falka ebyan sida aayadda 1 oo kale, iyada oo uu la socdo fal tegay. Tani waa mid ka mida sida Ciise u ogsoonaan naftiisa iyo awooddiisa (3:35; 17:2; Matayos 28:18). Falka tegay isna waa muhiim. Aabbuhu Ciise waxa uu siiyay “wax walba” ka hor intii aan isku tallaabta lagu qdbin. Laguma siinin addeecitaankiisa, laakiinsa waxa lagu siiyay cidda uu ahaa! Wuu ogsoonaan cidda uu yahay, waxaanu lugaha u dhaqay kuwii ku murmayay ciddii ugu waynayd!

▣ **“Inuu Ilaah ka yimid”** Tani waa midda labaad ee saddex waxyaalood oo lagu sheegay aayadda 3 kuwaasi oo ahaa

1. In Aabbuhu uu Ciise wax walba gacanta u geliyay
2. Inuu Ilaah ka yimid
3. Inuu Ilaah dib ugu laabanayo (7:33; 14:12, 28; 16:5, 10, 17, 28; 20:17)

Labada danbe waxa ay qayb ka yihiin labonimada kor iyo hoos oo caan uu ku yahay qoraalka Yooxanaa.

Midda #2 waa erayo gaar ah oo la yaab leh Yooxanaa dhexdiisa (8:42; 13:3; 16:28, 30; 17:8). Waxay wadataa faragelinta asalka iyo goobta (Ilaahnimada ka ahaatay samada).

13:4 “cashadii ka kacay” xasuusno inay ku fadhiyeen cagahooda oo aanay ku fadhiyin kuraas iyo wax la hal maala.

▣ **“oo dharkii iska dhigay”** jamacu waxa uu tilmaamayaa dharkiisii uu xidhnaa (19:23; Falimaha Rasuullada 8:16). Waxa xiiso leh iyada oo isla falkan loogu dhex adeegsaday 10:11, 15, 17, 18 Ciise dhiibistii noloshiisa (aayadda 37). Waxaana laga yaabaa inay tahay mid kale oo ka mida erayada labonimada xambaarsan ee Yooxanaa. Waxaanay u muuqataa in falka caga dhiqistu ay tahay mid ka wayn dersi is hoosaysiini ku sugan tahay oo keliya (aayadaha 6-10).

13:5 “xertiisa cagaha u maydho” eraygan Giriigga waxa loo adeegsaday “maydhista qayb ka mida jidhka oo keliya.” Erayga ku sugan aayadda 10 waxa loo adeegsaday maydhista jidhka oo dhan. Haddaba, cago dhiqistu waxay ahayd shaqada adoommada. Oo xitaa rabbaaniyiintu middan kamay filan jirin xertooda. Ciise haddaba, isaga oo ogsoonaa Ilaahnimadiisa, ayuu rabay inuu dhaqo cagaha xertiisa (xitaa Yuudas)!

13:6 su’aasha Butros waxa ku jirta diidmo uu ku diidayo waxa uu rabo Ciise inuu sameeyo. Butros marwalba wuxuu moodayay inuu ogsoonaa waxa Ciise uu qabanayo iyo waxaanu qabanayn (Matayos 16:22).

13:7 Rasuulladu iyaga oo la noolaaday Ciise, hadana hadiyo goor may fahmi jirin waxyaalaha uu samaynayo iyo waxbaristiisa (2:22; 10:6; 12:16; 14:26; 16:18). Fahan la’aantani waa ujeedo lagu sheegayo labonimada ka dhexaysa kor iyo hoos.

13:8 “Weligaa cagaha ii maydhi maysid” tani waa hadal xooggan oo wata labo diidmo iyadoo loogala jeedo “marnaba ma dhacayso.” Wax ku saabsan “weli” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 6:58.

☐ **“Haddaan kuu maydhin, qayb iguma lihid”** Waa jumlad shuruudeed kaalinta saddexaad ah. aayaddani waxay tusinaysaa waxa halkan ka dhacayaa inuu ka yar yahay casharka la taaban karo ee ka imanaya. Aayadaha 6-10 waxay u muuqdaan inay la xidhiidhaan shaqadii denbi dhaafka ahayd ee Ciise ku dul qabtay isku tallaabta. Erayada labaad waxay ka tarjumayaan erayo Axdiga Hore ah oo la xidhiidha dhaxaltooyo (Sharciga Kunoqoshadiisa 12:12; 2 Samuu’eel 20:1; 1 Boqorradii 12:12). Waana erayo xooggan oo ah ka reebitaan.

13:9 Diidmada Giriigga ah ee “maya” (ME) waxay sheegaysaa amar “maydh.”

13:10 “Kii maydhani” Ciise tusaale ahaan wuxuu uga hadlayaa badbaadada. Butroso waa la maydhay (badbaadiyay, 15:3; Tiitos 3:5), laakiin wuxuu u baahan yahay inuu towbad keenka sii wado (1 Yooxanaa 1:9) si loo adkeeyo xidhiidhka weheshiga.

Waxa kaloo suurto gal in macnaha laga dheehan karo Ciise oo ka hadlya gacan gelinta Yuudas (aayadaha 11 iyo 18). Haddaba, tusaalaha maydhistu wuxuu tilmaami karaa (1) Butrus jidhkiisa ama (2) kooxda Rasuullada.

☐ **“idinkuna waa nadiifsan tihiin”** erayga “idinku” waa jamac, waxaanu tilmaamayaa kooxdii xerta ahayd, marka laga reebo Yuudas (aayadaha 11, 18; 6:70).

“nadiif” waxay tilmaamaysaa farriinti Ciise ee ay la yaabeen (15:3). Iyagu waa nadiif maxaa yeelay waxay rumaysteen oo isku halleeyeen Ciisahan nadiifta ah.

Erayada ah “dhammaantiin ma aha” ka eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 6:64.

13:11 TEV iyo NET waxa ay aayaddan ku darayaan inay ka mid tahay faallada qoraaga.

NASB (UPDATED) TEXT: 13:12-20

¹²Haddaba markuu cagihii u maydhay iyagii, oo dharkiisa qaatay, oo haddana fadhiistay, markaasuu ku yidhi, Ma garanaysaan waxaan idinku sameeyey? ¹³Waxaad iigu yeedhaan, Macallin iyo Sayid, waadna ku hagaagsan tihiin, waayo, waan ahay. ¹⁴Haddaba haddaan cagaha idiin maydhay anigoo ah Sayidka iyo Macallinka, idinkuna waa inaad cagaha isu maydhaan. ¹⁵Waxaan idin siiyey masaal inaad samaysaan sidaan idinku sameeyey. ¹⁶Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Addoon kama weyna sayidkiis, mid la soo dirayna kama weyna kii soo diray. ¹⁷Haddaad waxyaalahan garanaysaan, waad barakadaysan tihiin haddaad yeeshaan. ¹⁸Dhammaantiin ka hadli maayo; waan garanayaa kuwaan doortay. Laakiin Qorniinka leh, Kan kibistayda cuna ayaa cedhibtiisa ii qaaday, waa inuu ahaado. ¹⁹Hadda dabadeed waxaas ayaan idiin sheegayaa intaanay dhicin, in markay dhacaan aad rumaysataan inaan ahay isagii. ²⁰Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kan aqbala ku alla kaan soo diro ayaa i aqbala, oo kan i aqbalaana WUXUU aqbalaa kii i soo diray.

13:12-20 iyadoo ka duwan aayadaha 6-10, Ciise halkan waxa uu halkan waxqabadkiisa ugu tusinayaa is hoosaysiinta. Rasuullada waxay ka doodayaan yaa ugu waynaa (Luukos 22:24). Haddaba, Ciise halkan waxa uu ku samaynaa shaqada addoomada kaddibna waxa uu sharraxayaa waxa loogala jeedo.

13:14 “haddaan” waa jumlad shuruudeed kaalinta koobaad ah taasi oo u muqata inuu qoraaga runta uga socdo.

▣ **“Sayidka iyo Macallinka,”** fiiro u yeelo qodobka ku sugan aayadaha 13 iyo 14. Sidoo kalena u fiirso magacyada. Isagu waa midka ku hadlayay awood, waxaanu muujinayaa Aabbaha isaga oo filaya addeecitaan daacadnimo! Waxa uu qabto iyaguna waa inay qabtaan (aayadda 15).

13:14-15 “idinkuna waa inaad cagaha isu maydhaan” Hadalkani ma waxa uu noqon karaa mid tilmaamaya is hoosaysiinta oo ay tahay inay kaniisaddu ku dhaqanto? Badanaa kooxaha Masiixiyiintu waxay yidhaahdeen maya, maxaa yeelay

1. Weligeed lama sheegin kaniisad ku dhaqantay Falimaha Rasuullada dhexdeeda
2. Weligeed laguma sheegin waraaqaha Axdiga Cusub
3. Weligeed laguma sheegin wax loo sameeyo sida baabtiisa oo kale (Matayos 28:19) iyo Cashada Rabbiga (1 Korintos 11:17-34).

Loogalama jeedo in macneheedu yahay caabudaad aan lahayn wax muhiimad ah.

Tusaalaha uu Ciise siiyay muu ahayn is hoosaysiinta oo keliya, laakiin waxa uu ahaa adeeg naf isu huritaan ah (15:12-13). Waxaana si fiican uga hadlayay 1 Yooxanaa 3:16. Ciise wuu jecelyahay ilaa dhammaadka (aayadda 1), iyaguna waa inay sidoo kale muujiyaan jacaylkaasi (naf isu hurista, wada qaybsiga dhibaataada).

13:16 “Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay,” macno ahaan waa “aamiin, aamiin” (sida aayadda 20). Waa eray Axdiga Hore loogu adeegsaday “run” (Xabquuq 2:4). Ciise ayaana aha ka keliya ee furitaanka hadalka u adeegsado. Waxa lagu sheegay (1) waafaqis ama (2) ansixinta hadalka ama falka. Marka loo adeegsaday bilowga jumlada iyadoo labo jeer ah, waxay tusinaysaa dareen u yeelashada. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Aamiin 1:51.

▣ **“Addoon kama weyna sayidkiis”** waa erayo hordhac ah oo gudbinaya xaqiiqada

1. Yooxanaa 13:16, mid la soo dirayna kama weyna kii soo diray
2. Yooxanaa 15:20
 - a. Haddii aniga ay I cadaadiyaan, idinkana way ku cadaadin doonaan
 - b. Haddii ay erayadayda dhowraan, kuwiinana way dhowri
3. Luukos 6:40 (la mid), mid walba markuu wanaag u dhan yahay wuxuu noqon doonaa sida macallinkiisa oo kale (Matayos 10:24)
4. Luukos 22:27 (la mid), Aniguse sida kan adeega ayaan idiin dhex joogaa.

13:17 “Haddaad waxyaalahan garanaysaan, waad barakadaysan tihii haddaad yeeshaan.” “haddaad” da ugu horraysaa waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah isla markaasna loogala socdo muhiimadda hadalka. Ta labaad “haddaad” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah oo macneheedu yahay wax qabad. Haddii aan ognahay waa inaan samayno (Matayos 7:24-27; Luukos 6:46; Rooma 2:13; Yacquub 1:22-25; 4:11)! Aqoonta maaha ujeedada, laakiin waa nolosha ah la midnimada Masiixa. tani waa falka Cibraaniga ah ee *shema*, “maqal si aad u samayso” (Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4).

13:18 “Qorniinku waa inuu ahaado” middani waxay sheegaysaa Yuudas, waana qarsoodiga ku jira qadarka iyo doonista aadanaha.

Ciise iyo xertiisu waxay rumaysteen Qorniinka! Marka lagu hadlana waxay ahayd mid la isku halleeyo (Matayos 5:17-19). Yooxanaa dhowr jeer ayuu faallo ahaan ku bixinayaa “Qorniinku inuu ahaado” (12:14; 13:18; 15:25; 17:12; 19:24, 36). Badanaa intii Ciise noolaa si buuxda looma wada fahmin qorniinka Axdiga Hore (tusaale ahaan, Hoosheeca 11:1) ama dhammaystirka Axdiga Cusub (Ishacyaah 7:14 ama Daanyeel 9:27; 11:31; 12:11).

▣ **“Kan kibistayda cuna ayaa cedhibtiisa ii qaaday”** waxa lagasoo xigtay Sabuurka 41:9. Caadada wax wada cunitaanku waxay tusinaysaa saaxiibtinimada waana midda Yuudas uu denbiga ka galay. Bariga dhexe ee Dhow qof cidhibtiisa inaad u qaaddaa waxay tusinaysaa nacaybka aad u qabto.

3:19 Aayaddani waxay tusinaysaa ujeedada Ciise ka lahaa mucjisooyinka iyo wax sii sheegista (20:31). Yooxanaa dhexdiisa rumaysashadu waxa weeyi mid koraysa oo sii soconaysaa. Haddaba, Ciise waxa uu si joogto ah u korinayay Rasuullada rumaysadkooda iyo kalsoonidooda. Eeg Mawduuca Gaarka ah 9:7.

Ciise rumaysadkooda wuxuu ku korinayaa

1. Erayadiisa
2. Camalladiisa
3. Ogaanshihiisa hore ee uu wax kasta ku ogsoonyahay

Ciise waxa uu keenay jid cusub oo lagu xelo xaqnimada Ilaah. Waxaanay jiraysaa Yuhuudda dhaqankooda iyo wixii ay rumaysnaayeen

1. Isaga ayaa ahaa muhiimadda, manay ahayn muhiimaddu Muuse
2. Nimcada oon ahayn camalka

▣ **“inaan ahay isagii.”** Middani waxay u noqonaysaa magaca Ilaah ee “YHWH” oo ka imanaya falka Cibraaniga ah ee “ahay” (“Anigu” Baxniintii 3:14). Ciise waxa uu si cad u sheeganaya inuu yahay Masiixii la ballan qaaday iyo inuu Ilaah xidhiidh la leeyahay (4:26; 8:24, 28, 58; 13:19 iyo 18:5, 6, 8; fiir u yeelo Matayos 24:5 iyo Markos 13:6; Luukos 21:8). Eeg Mawduuca Gaarka ah ee 6:20.

13:20 badanaa Yooxanaa wuxuu adeegsanayaa erayga “rumays” (*pisteuō*), “rumaysasho” (*pisteuo eis*) ama “rumaysashada inuu” (*pisteuō hoti*) isaga oo uga jeeda Masiixiniinta (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23), laakiin sidoo kale wuxuu adeegsanayaa erayo kale sida “aqbalis” ama “soo dhowayn” (1:12; 5:43; 13:20). Injiilku haddaba waa soo dhowayn qof iyo rumaysadka xaqiiqada ku saabsan qofkaas iyo sidoo kale ku dayashada noloshiisa.

▣ **“Kan aqbala ku alla kaan soo diro ayaa i aqbala”** Waa erayo xooggan oo tusinaya awoodda ay leeyihiin xerta Ciise ee isagu uu siiyay. Waxaanay u shaqayn kartaa dhowr siyaabood

1. Adeegyadii Labo iyo tobankii xerta ahaa (Luukos 10:16) iyo Todobaatan (Matayos 10:40)
2. Markhaati furista kaniisadda (17:20)

Farriinta Ciise waxa ay wadataa awood bedelitaanka nolosha ah oon la xidhiidhin kuwa gudbinya. Awooduna waxay ku jirtaa farriinta (injiilka), mana aha farriin ku salaysan dunida.

NASB (UPDATED) TEXT: 13:21-30

²¹Ciise markuu sidaas yidhi, ayuu ka qalbi xumaaday, wuxuuna bayaan u sheegay oo yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Midkiin ayaa i gacan gelin doona. ²²Markaasay xertii is-eegeegen iyagoo aan garanaynin kii UU ka hadlayay. ²³Waxaa joogay oo laabta Ciise ku tiirsanaa xertiisa midkood oo uu Ciise jeclaa. ²⁴Sidaa daraaddeed ayaa Simoon Butros calaamo u sameeyey oo ku yidhi, Noo sheeg yuu yahay kan UU ka hadlayo. ²⁵Isagoo sidii ugu tiirsan laabta Ciise, ayuu ku yidhi, Sayidow, waa kuma? ²⁶Markaasaa Ciise ugu jawaabay, Waa kii aan koosaarta u dari doono oo aan siin doono. Haddaba markuu koosaarta u daray ayuu qaaday oo siiyey Yuudas Iskariyod ina Simoon. ²⁷Markuu koosaarta qaatay dabadeed, Shaydaan baa galay isagii. Sidaa daraaddeed Ciise wuxuu ku yidhi, Waxaad samaynayso dhaqso u samee. ²⁸Kuwa la fadhiyey midkoodna ma garanaynin sababta uu sidaas ugula hadlay isaga. ²⁹Yuudas baa kiishaddii lacagta hayay, taas aawadeed qaar waxay u maleeyeen in Ciise ku yidhi, Soo iibi waxaynu iidda u baahan nahay, ama, Masaakiinta wax sii. ³⁰Isagu haddaba markuu koosaartii qaatay, markiiba ayuu baxay, oo waxayna ahayd habeennimo.

13:21 “ka qalbi xumaaday” Gacan gelintii Yuudas Ciise wuu ka calool xumaaday (ereyadan oo kale ayuu ku dhex adeegsaday Ciise 12:27). Ciise Yuudas wuxuu u doortay tamartiisa ruuxiga ah, laakiinse weligeed may noqonin mid guulaysata (aayadda 18).

▣ **“Runtii, runtii”** eeg fiirada 1:51.

13:22 tani waa aayad cajiib leh. Kooxdii xertu waxay noqdeen kuwo cabsada maxaa yeelay qorshaha hore loo sii sheegay waxa uu iyaga ka dhigi karaa gacan geliyaha (Markos 14:19). Tanina waa dhibaataada wax cadaaynta. Shuqullada Ilaah ma kharriibaan doonista xorta ah ee aadanaha, laakiinse marka la caddeeyo waxa ka timaadda cidhib xumadeeda!

13:23 “oo uu Ciise jeclaa” Waxay u muuqataa inay tilmaamayso Yooxanaa laftiisa (13:23, 25; 19:26-27, 34-35; 20:2-5, 8; 21:7, 20-24). Cutubka 19, aayadda 26 ayaa middan ansixinaysa. Yooxanaa magaciisana marnaba kama dhex muuqanayo Injiilka dhexdiisa. Ciise miyuu kala jeclaa dadka? Hubaal waxa uu lahaa koox sii hoosaysa (Butros, Yacquub, iyo Yooxanaa) iyo qoys gaar ah (Laasaros, Maryan, Marta).

13:25 macnahani waxa uu ka tarjumayaa qaabkii qarnigii koobaad wax looga cuni jiray Falastiin. Xertu waxa ay ahaayeen kuwo dhulka hoose ku fadhiyay gogol, isla markaasna lugtooda ku fadhiista kuna cuna gacanta midig. Yooxanaa markaa wuxuu fadhiyay dhinaca mid ee Ciise, halka Yuudasna uu ka fadhiyay dhinaca bidix (dhinaca sharafta leh). Sababta sidan loogu fadhiyayna Qorniinka lagu masheegin. Yooxanaa wuxuu jalleecay Ciise waxana wuu su’aalay.

13:26 “Waa kii aan koosaarta u dari doono oo aan siin doono” tani waxay ahayd calaamad sharaf (Ruud 2:14). Yuudas wuxuu fadhiyay Ciise bidixdiisa, taasi oo iyana sidoo kale ahayd meel sharaf leh. Haddaba, Ciise wuxuu isku dayay inuu gaadho Yuudas!

Koosaartu waxay ahayd saxan ka kooban geedo iyo maraq (eeg Mawduuca Gaarka ah 13:2). Markos oo la mida (14:20) ayaa odhanaya “igula jira.” Tanina waa markaati goob joog ah.

▣ **“Iskariyod”** Eeg Mawduucan Gaarka ah iyo fiirada 6:71 iyo 18:2.

MAWDUUC GAAR AH: ISKARIYOD

Yuudas waxa uu dhegastay, u fiirsaday, oo la joogay weheshina la sameeyay Sayid Ciise sanado dhowr ah, laakiinse haddana ilaa hadda muu shakhsi ahaan ula lahayn xidhiidh rumaysad ah (Matayos 7:21-23). Butros laftiisa ayaa xoogaa jarribaad ahi ku jirtay sida Yuudas oo kale, laakiin waxay ahayd mid natiijadeedu ka duwantahay. Dood badan ayaa ka taagan ujeedadii Yuudas iyo khiyaanadiisii:

1. Waxay ahayd sabab dhaqaale raadis (Yooxanaa 12:6)
2. Waxay ahayd arrin siyaasadeed (William Klassen, *Judas Betrayer or Friend of Jesus?*)
3. Waxay ahayd ruux ahaan (Yooxanaa 13:27)

Dhinaca ku saabsan saamaynta Shaydaanka waxa jira ilo wanaagsan oo dhora kana hadlayay arrinta (waxa loo kala horrasysiiyay sida aan ugu kala kalsoonahay).

1. Merrill F. Unger, kitaabkiisa *Biblical Demonology, Demons in the World Today*
2. Clinton E. Arnold, kitaabkiisa *Three Crucial Questions About Spritual Warfare*
3. Kurt Koch, kitaabkiisa *Christian Counseling and Occultism, Demonology Past and Present*
4. C. Fred Dickason, kitaabkiisa *Demon Possession and the Christian*
5. John P. Newport, kitaabkiisa *Demons, Demons, Demons*
6. John Warwick Montgomery, kitaabkiisa *Principalities and Powers*

Ka taxadir arrimaha la xidhiidha dhaqamada. Shaydaanku wuxuu Butros ku saamaynayaa Matayos 16:23 isagoo isku dayaya inuu Ciise ka hor istaago dhimashadiisa ujeeddada ku socota. Shaydaanku marwalba sida ugu suurto galsan wuxuu isku dayay inuu Ciise ka hor istaago shaqadiisa badbaadaba ah ee inaga darteen uu u dhimanayay.

1. Jarribaaddii Ciise, Luukos 4
2. Wuxuu adeegsaday Butros
3. Wuxuu adeegsaday Yuudas iyo gudigii Sehadriinka

Xitaa Ciise wuxuu Yuudas ku tilmaamayaa shaydaan sida ku xusan Yooxanaa 6:70. Kitaabku kama hadlayo shaydaanka iyo saamaynta uu ku yeelan karo rumaystayaasha, laakiinse waxa saamayn ku yeelanaya rumaystayaasha sharkooda shakhsi ahaaneed iyo doorashooda.

1. *Kerioth*, magaaladii Yahuudah (Yashuuca 15:25)
2. *Kartan*, magaalo ku taalla Galiili (Yashuuca 21:32)
3. *Kar oides*, caleemo geed ku yaal Yerusaaalem ama Jeriko
4. *Scortea*, kiish harag ah (Yooxanaa 13:29)
5. *Ascara*, is deldelid (Cibraani) Matayos 27:5
6. middida shirqoolaha (Giriig), oo macneheedu yahay inuu ahaa Qiirtoole Siimoon oo kale ah (Luukos 6:15).

13:27 “Shaydaan baa galay isagii” waa meesha keliya ee lagu adeegsaday “Shaydaan” Injiilka Yooxanaa dhexdiisa. Macneheeduna waa “cadaw” luqada Cibraaniyada (Luukos 22:3). Eeg Mawduuca Gaarka ah 12:31. Yuudas ma Shaydaanbaa galay oo arrintan kamuu masuul ahayn? waxa jirta inuu Kitaabku sheegayo farqiga u dhexeeya maamulka ruuxiga (Ilaah wuxuu adkeeyay qalbigii Fircoon) iyo masuuliyadda aadanaha ee maamulka jidhka. Aadanuhu xor uguma aha ikhtiyaarkooda sida ay u malaynaayan. Dhammaanteenna, taariikh ahaan, iyo khibrad ahaanba waxa aan nahay kuwo xaalado la dersaan. Waxaana intaas sii dheer go’ aaminta jidh ahaaneed ee ka timaadda xukunka ruuxiga ah (Ilaah, Ruuxa, malaa’igaha, Shaydaanka, iyo jinka) kuwanina waa qarsoodi! Si kastaba ha ahaatee, aadanuhu maaha aalado; waxaynuna nahay kuwo ka masuula ficilladooda, doorashadooda, iyo cidhibta ka dhalaysa. Yuudas falka wuu ku dhaqaaqay, manuu ahayn kelidii! Laakiinse damiir ahaan wuxuu ka masuul yahay wuxuu sameeyay. Yuudas gacan gelintiisa waa la sii sheegay (aayadda 18), Shaydaankuna wuxuu ahaa hoggaamiyaha (eeg Mawduuca Gaarka ah 12:31). Waxa haddaba wax laga murugoodo ah Yuudas oo weligiis aan aqoonsan amaba isku hallayn Ciise.

13:29 “Yuudas baa kiishaddii lacagta hayay” Yuudas waxa uu hayay oo maamulayay lacagta kooxda (12:6). Eeg fiirada 18:1.

13:30 “waxayna ahayd habeennimo.” Tani ma wakhtibaa mise waa qiimayn ruux ahaaneed? Yooxanaa waxa uu adeegsanayaa ereyadan loo fahmi karo siyaabo badan (Nikodemos, 3:2; 19:39).

NASB (UPDATED) TEXT: 13:31-35

³¹Haddaba markuu baxay. Ciise ayaa yidhi, Hadda Wiilka Aadanahu waa ammaanmay, Ilaahna waa ku ammaanmay isaga. ³²Haddii Ilaahu ku ammaanmay isaga, Ilaahna waa ammaani doonaa isaga qudhiisa, oo markiiba wuu ammaani doonaa. ³³Carruur yahay yaryari, weli in yar baan idinla joogayaa. Waad i dooni doontaan, oo sidaan Yuhuuddii ku idhi, Meeshaan tegayo iman kari maysaan, idinkana hadda sidaasaan idinku leeyahay. ³⁴Waxaan idin siinayaa qaynuun cusub oo ah, Waa inaad isjeclaataan; sidaan idiin jeclaaday, idinkuna waa inaad isu jeclaataan. ³⁵Sidaasay dadka oo dhammi idinku garan doonaan inaad xertaydii tihiin, haddaad jacayl isu qabtaan.

13:31-38 aayadahani waxa weeyi macne ballaadhan oo ahaa su’aalo taxane ah isla markaasna xertu (13:36; 14:5, 8, 22; 16:17-19) isku su’aalayeen goobtii ay jooheen habeenkii Cashada Rabbiga. Waxa muuqatana in Ciise hadalladiisii ahaa inuu tegayo ay Rasuullada ku sababeen inay is waydiiyaan su’aalo ku saabsanaa fahanka qaldan ee ay ka fahmeen Ciise ereyadiisa.

1. Butros (13:36)
2. Toomas (14:5)
3. Filibos (14:8)
4. Yuudas (maaha Iskariyod) (14:22)
5. Kuwo ka mida xertiisii (16:17-19)

13:31 “Wiilka Aadanahu” waxa uu ahaa magaca Ciise naftiisa u doortay asalkiisuna wuxuu ka imanayaa Yexesqeel 2:1 iyo Daanyeel 7:13. Waxa ay tilmaamaysaana Ciise oo isugu jira aadane iyo Ilaanimo. Ciise wuxuu magacan u adeegsaday maxaa yeelay Yuhuuddii rabbaaniyiinta ahayd may adeegsanin, sidaasi darteedna waxay ahayd mid aan tusinin dhalasho balse tusinaysa labadiisa dabeecadood (1 Yooxanaa 4:1-3).

13:32 Waxa jira farqi aayaddan ah oo u dhexeeya qoraal gacmeeyada Giriigga. Qoraalka dheer waxa laga helayaa NASB, NKJV, NRSV, TEV, iyo NJB. Waxaana taageeraya qoraal gacmeedaya a², A, C², K, iyo Textus Receptus ka. (“Haddii Ilaahu ku ammaanmay isaga,”) Waxa lagaga tegay MSS P⁶⁶, a*, B, C*, D, L, W, iyo X. Waxaanay tani u muuqataa midda ugu habboona qoraal gacmeedyada. Laakiinse waxa suurto gala in culimadu ku dawakheen isbarbar dhigga iyagoo markaasna iska dhaafay erayada hore.

▣ **“ammaanmay”** eraygan afar ama shan jeer ayaa lagu dhex adeegsaday aayadda 31 iyo 32. Labo ama saddex jeer waa iyadoo fal tegay ah, labo jeerna waa mustaqbal. Waxa ay tilmaamaysa markaa qorshaha Ilaah ee ah badbaadada ku imanaysa dhimashada iyo sarakidda Ciise (7:39; 12:16, 23; 17:1, 5). Halkanna waxa ay ku

sheegaysaa dhacdooyinka ku imanaya nolosha Ciise. Waxaana hubaala imaanshohooda sida loogu sheegay iyaga oo ahaa dhacdooyin tegtay. Eeg fiirada 1:14.

13:33 “Carruur yahay yaryari” Yooxanaa isaga oo Efesos ama agagaarkeeda ku ahaa nin wayn ayuu wax qorayay, waxaanu sidanoo kale adeegsanayaa isagoo la hadlayaa dhegastayaashiisa/akhristyaashiisa sid aku sugan 1 Yooxanaa 2:1, 12, 28; 3:7, 18; 4:4; 5:21. Tusaalaha Ciise ee halkani waxa weeyi si kale oo uu isugula magacaabayo Aabbaha, waayo isagu waa aabbe, walaal, badbaadiye, saaxiib, iyo Sayid. Si kale haddii loo dhigana waxa uu leeyahay dabeecadda aadanenimo iyo midda Ilaahnimmo.

▣ **“weli in yar baan idinla joogayaa. .. sidaan Yuhuuddii ku idhi”** Ciise middan waxa uu ku yidhi hogaamiyayaasha Yuhuudda bilo ka hor (7:33); iminkana waxa uu u sheegayaa Rasuulladiisa (12:35; 14:9; 16:16-19). Haddaba, waxa muuqata iyada oo wakhtigu aanu ahayn mid cad ama la hubo.

▣ **“Meeshaan tegayo iman kari maysaan”** Hogaamiyayaasha Yuhuuddu gebi ahaan ma iman karaan (7:34, 36; 8:21). Xertuna isaga lama joogi doonaa ilaa inta aanay ka dhimanin. Geerida ama farxaddu, kuwa isaga raaca ayay isaga la midayn doonaan (2 Korintos 5:8; 1 Tesaloniika 4:13-18).

13:34 “Waxaan idin siinayaa qaynuun cusub oo ah, Waa inaad isjeclaataan” “inaad is jeclaataan” muu ahayn qaynuun cusub (Luukos 19:18; “qaynuun” eeg Mawduuca Gaarka ah 12:50). Waxa cusubi waxa uu ahaa in xertu is jeclaadaan sida Ciiseba iyaga u jeclaaday (15:12, 17; 1 Yooxanaa 2:7-8; 3:11, 16, 23; 4:7-8, 10-12, 19-20; 2 Yooxanaa 5).

Injiilku waa sida shakhsi lasoo dhaweeyo oo kale, waana jidh xaqiiqo ah oo la rumaysto, iyo sidoo kale nolol lagu noolaado (14:15, 21, 23; 15:10, 12; 1 Yooxanaa 5:3; 2 Yooxanaa 5, 6; Luukos 6:46). Injiilka waa la aqbalaa, la rumaystaa, waana lagu noolaadaa, waxaana lagula noolaadaa jacayl.

Waxaan jeclahay Bruce Corley qormada maqaalkiisa “Biblical Theology of the New Testament” ee ku sugan kitaabka herminitiiga ee *Foundations For Biblical Interpretation*: “Dadka Masiixa waxa dabeecad u ah jacayl, nimacada gudahana waxa ku xidhan jacayl ku dhisan shaqada Ruuxa (Galatiya 5:6, 25; 6:2; Yacquub 3:17-18; Yooxanaa 13:34-35; 1 Yooxanaa 4:7)” (p. 562).

13:35 “Sidaasay dadka oo dhammi idinku garan doonaan inaad xertaydii tihiin” jacaylku waa dabeecadda aanu Shaydaanku ka adkaan karin, rumaystayaashana waa in jacaylkoodu uu noqdo dabeecaddooda (1 Yooxanaa 3:14; 4:7-21).

▣ **“haddaad”** waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah kana tarjumaysa camal. Sida aan ula dhaqmayno Masiixiyiintu waa inuu noqdo mid waafaqsan oo xidhiidh la leh Ciise (1 Yooxanaa 2:9-11; 4:20-21).

NASB (UPDATED) TEXT: 13:36-38

³⁶Simoon Butros ayaa ku yidhi, Sayidow. xaggee baad tegaysaa? Ciise wuxuu ugu jawaabay, Meeshaan tegayo hadda ii raaci kari maysid, laakiin mar dambe waad i soo raaci doontaa. ³⁷Butros ayaa ku yidhi, Sayidow, maxaan hadda kuu raaci kari waayay? Naftaydaan aawadaa u bixin doonaaye. ³⁸Ciise ayaa ugu jawaabay, Miyaad naftaada u bixin doontaa aawaday? Runtii, runtii, waxaan kugu leeyahay, Diiqu ciyi maayo ilaa aad saddex kol i dafirtid.

13:36 “Simoon Butros ayaa ku yidhi” tani waa su’aalo taxane ahaa oo xertu ay Ciise ku waydiinayeen hadalkii Ciise ee aayadaha 31-35 (13:36; 14:5, 8, 22; 16:17-19). Waxaan ku faraxsanahay su’aalahan xertu waydiinayeen inuu Yooxanaa xasuustay oo diiwaan geliyay!

13:37 “Naftaydaan aawadaa u bixin doonaaye.” Butros sidan ayuu uga jeeday, laakiinse waxa ay tusinaysaa sida aadanaha leexday u taagta daran yihiin iyo sida aan daacad ugu noqon karto Sayidkeenna.

13:38 “Runtii, runtii” Eeg fiirada 1:51.

▣ **“Diiqu ciyi maayo ilaa aad saddex kol i dafirtid.”** Kani waxa uu ahaa diig Roomaan ah, waayo Yuhuuddu xayawaanka umay oggolaan jirin oo magaaladu waxay ahayd quduus. Tanina waa sababta badanaa dadka

hodanka ahi u lahaayeen beero magaalada dibaddeeda ah oo ku yaallay Buur Saytuun. Beerta Getsamanenana waxay ka mid ahayd kuwan.

Ciise waxa uu adeegsanayaa wax sii sheegis isaga oo dhiirri gelinaya rumaysadka Naftiisa. Xitaa waxyaalaha diidmadaas oo kale ahi waxay muujinayaan cilmigiisa waxaanay maamulaysaa dhacdooyinka mustaqbalka (18:17-18, 25-27; Matayos 26:31-35; Markos 14:27-31; Luukos 22:31-34).

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu Yooxanaa u diiwaan gelin waayay Cashada Rabbiga?
2. Muxuu Ciise u maydhay cagaha xertiisa? Inaguna ma inaan cagaha isu maydhnaa?
3. Muxuu Ciise Yuudas uugu doortay inuu xertiisa ka mid noqdo?
4. Sidee qof ku ogaan karaa inuu yahay Masiixi dhab ah?

YOOXANAA 14

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ciise waa jidka lagu heli karo Aabbaha	Jidka, runta, iyo nolosha	Xidhiidhka rumaystayaahu la leeyihiin Ciisahan la ammaanay	Ciise waa jidka lagu heli karo Aabbaha	Niyad jabkii macasalaamaynta (13:31-14:31)
14:1-14	14:1-6	14:1-7	14:1-4	14:1-4
	Aabbahaa muujiyay		14:5	14:5-7
	14:7-11		14:6-7	
		14:8-14	14:8	14:8-21
	Tukashadii laga jawaabay		14:9-14	
	14:12-14			
Ballan qaadkii Ruuxa	Ciise oo ballan qaaday caawiye kale		Ballan qaadkii Ruuxa Quduuska ah	
14:15-24	14:15-18	14:15-17	14:15-17	
		14:18-24	14:18-20	
	Isku jirista Aabbaha iyo Wiilka			
	14:19-24		14:21	
			14:22	14:22-31
	Hadiyadda nabaddiisa		14:23-24	
14:25-31	14:25-31	14:25-31	14:25-26	
			14:27-31a	
			14:31b	

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad

2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 14:1-31

- A. Ma jirto qaybin ah saddarradu laga bilaabo Yooxanaa 13 ilaa 17 maxaa yeelay fahan ahaan waa isku qayb, waana wada hadalkii qolka habeenkii Cashada Rabbiga. Waxaana muuqata hadalkii Ciise ee ahaa tegitaankiisu, inuu xerta ku sababay inay is waydiiyaan su'aalo badan. Macnahini haddaba waxa uu ku dhisan yahay su'aalaha taxanaha ahaa ee Rasuullada, waxaanay ku salaysan tahay fahan la'aantoodii erayada Ciise
1. Butros (13:36)
 2. Toomas (14:5)
 3. Filibos (14:8)
 4. Yuudas (maaha Iskariyod) (14:22)
 5. Kuwo ka mida xertiisii (16:17-19)
- Xasuuso in Yooxanaa adeegsanayo wada sheekaysiga si uu u gudbiyo xaqiiqada!
- B. Su'aalaha waxay weli caawinayaan rumaystayaasha
1. Waxay tusinayaan in xertu iyaga oo jidh ahaan Ciise la joogay hadana aanay fahmin isaga.
 2. Kuwo ka mida hadalladii Ciise ee ugu qaalisanaa waxa lagaga jawaabay su'aalaha fahan la'aanta ahaa.
- C. Cutubka 14 wuxuu ku bilaabmayaa Ciise oo ka hadlayaa "kaalmeeyaha" iman doona.
1. Ciise sheegitaankan Ruuxa Quduuska ah ee uu sheegay waxay la xidhiidhaa warwarkii iyo cabsidii xertu ka qabeen tegitaankiisa (13:33, 36).
Michael Magill, ayaa kitaabkiisa New Testament TransLine (p. 355) waxa uu ku samaynayaa kormaris macnaha cabsidadan
 - a. "maalin maalmaha ka mida ayaad ila joogi doontaan meesha aan tegayo" aayadaha 1-11
 - b. "waxa idiin fiican inaan tago" aayadaha 12-17
 - c. "waxaan idinku iman doonaa meeshaad joogtaan anigoo isku kiin muujin doona" aayadaha 18-26
 - d. "waxaan idinkaga tegayaa nabadayda" aayadaha 27-31
 2. Ka hadalka shaqada Ruuxa Quduusku way xadidan tahay, waxaana sidoo kale jira dhinacyo badan oo muhiim ah lana xidhiidha shaqadiisa oo dhammaantood aan lagaga hadlin halkan.
 3. Shaqada Ruuxa waa
 - a. Muujiyaha runta iyo
 - b. Raaxeeye shakhsi ahaaneed

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 14:1-7

¹Qalbigiinnu yuusan murugoon. Ilaah waad rumaysan tihii, anigana i rumaysta. ²Guriga Aabbahay wuxuu leeyahay hoyaal badan. Haddaanay sidaas ahayn waan idiin sheegi lahaa, maxaa yeelay, waxaan u tegayaa inaan meel idiin sii diyaariyo. ³Oo haddaan tago oo meel idiin diyaariyo, mar dambe waan soo noqon doonaa, oo xaggaygaan idiin qaadan doonaa, in meeshaan joogo, idinkuna aad joogtaan. ⁴Oo meeshaan tegayo iyo jidkaba waad taqaanniin. ⁵Toomas ayaa ku yidhi, Sayidow, ma naqaan meeshaad tegaysid ee sidee baan ku naqaan jidka? ⁶Markaasaa Ciise wuxuu Toomas ku yidhi, Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku yimaado maahee. ⁷Haddaad i garateen, Aabbahayna waad garan lahaydeen. Hadda ka dib waad garanaysaan, waadna aragteen.

14:1 “**yuusan**” waa fal amar ah oo diidmo xambaarsan hadiyo goorna loogala jeedo joojinta fal hore u socday. “joojiya in qalbiyadiinu murugoodaan.” Ciise sheegistii tegitaankiisa ayaa abuuray walaac wayn.

▣ “**qalbigiinnu**” u fiirso iyadoo jamacani uu tilmaamayo Ciise oo la hadlayay dhammaanba kow iyo tobankii. Adeegsiga Cibraaniga ah ee “qalbi” waxa ay ka tarjumaysaa gebi ahaanba qofka: maanka, doonista, iyo caadifadaha (Sharciga Kunoqoshadiisa 6:5; Matayos 22:37). Eeg Mawduuca Gaarka ah 12:40.

▣ “**Ilaah waad rumaysan tihiiin, anigana i rumaysta.**” Kuwani waa mid ahaan labo amar oo jooga (NASB, REB) ama waa labo tusmaynood, ama labadaba way isugu jiraan (NKJV, NJB iyo NET oo odhanaya ta hore waa tusmayn ta labaadna waa amar). Rumaysashadu waa wax soconaya oo joogto ah, qaabka isu dheelli tirka naxwe ahaan marka la eegana, waxay tusinaysaa Ciise oo sheeganaya inuu la siman yahay Ilaah. Sidoo kale xusuusnow in ay kuwani ahaayeen Yuhuud (Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-6) waxaanay aqoonsanaayeen waxa looga fasiraan karo hadal Ciise (eeg Mawduuca Gaarka ah: Saddexmidnimada 14:26). Rumaysashada awooddu waa mid Masiixi noqoshaduna waa mid kale. erayadani haddaba diiradda ma saarayaan caqido, laakiin waxa ay saarayaan shakhsiyadda Ciise Masiix.

14:2 “**Guriga Aabbahay wuxuu leeyahay**” “guri” Axdiga Hore dhexdiisa waxa loogu adeegsaday Waab ama Macbad (2 Samu’eel 7), si kastabana ha ahaatee, macnaha halkan waxa ay ku tusinaysaa qoyska Ilaah ee janada amaba la joogitaanka macbadkiisa (Sabuurka 23:6; 27:4-6).

▣

NASB, NRSV “**hoolal badan**”

NKJV “**guryo**”

TEV “**qolal**”

NJB “**meelo badan**”

Tarjumaadda KJV ee “mansions” waxa weeyi dhagrig. Erayada Giriigga ah ee macnihiisu yahay “hoolal lagu negaado” (14:23) iyadoo bilaa lacag ah. Muuqaalku waxa weeyi iyada oo rumaystayaasha ay guryohooda ku lahaanayaan guriga Ilaah (TEV, NJB), oo la mida meel dhammaan si wada jira wax loogu wada cuno maalin walba.

Waxa kaloo xiiso leh iyada oo isla erayga Giriiggu uu leeyahay asalka ah “daa’im” oo fure ka ah (cutubka 15) Yooxanaa dhexdiisa. La joogista Aabbuhu waxay ku tiirsantahay la joogitaankeena Wiilka.

▣ “**haddaan**” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah loogu yeedhay “ka hor imanaysa xaqiiqada.” Waxa jira qolal badan oo diyaar ah, wayna adagtahay tarjumaadda cibaaradan.

▣

NASB, REB, NIV “**Haddaanay sidaas ahayn waan idiin sheegi lahaa**”

NKJV “**haddaanay ahayn sidaas, waan idiin sheegi lahaa**”

TEV “**idiin maan sheegeen tan haddaanay sidaas ahayn**”

NJB, NET “**haddii kale waan idiin sheegi lahaa**”

Tarjumaadda macno ahaaneed ee Young “**haddaanay sidaas ahayna, waan idiin sheegi lahaa**”

New Berkley Version “**haddaanay tani sidaas ahayn, waan idiin sheegi lahaa**”

Williams Translation “**haddaanay jiri lahayn, waan idiin sheegi lahaan**”

▣ “**waxaan u tegayaa inaan meel idiin sii diyaariyo.**” Tan macneheedu maaha iyadoo janada loo qaato meelaan hore loosii diyaarinin hadda ka hor, laakiinse nolosha Ciise, waxbaristiisa, iyo dhimashadiisa ayaa aadanaha leexday u ogolaanaya inay u dhowaadaan Ilaah quduuska ah. Ciise wuu ka horraynayaa rumaystayaasha isaga oo ah hagoghooda (Cibraaniyada 6:20).

14:3 “**haddaan**” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah oo macneheedu yahay fal la samaynayo. Ciise wuxuu u sheegay inuu si dhaqso ah ugu laabanayo Aabbaha (7:33; 16:5, 10, 17, 28) waxaana iyaga u diyaarin doonaa meel.

United Bible Societies oo caawinaya tarjumayaasha Yooxanaa ayaa Newman iyo Wider waxa ay sheegayaan in ereyadan loo fahmi karo macnaha “marka aan tago kaddib” ama “marka aan tago” ama “ilaa aan tago” (p.456).

▣ **“waan soo noqon doonaa, oo xaggaygaan idiin qaadan doonaa,”** middani waxay sheegaysaa Imaatinka Labaad ee Ciise amaba dhimashada (2 Korintos 5:8; 1 Tesaloniika 4:13-18). Weheshigan fool ka foolka ah ee Ciise waxa uu ka tarjumayaa is weheshiga Ciise iyo Aabbaha (1:1, 2). Masiixiyiintuna waxay ka qayb qaadan doonaan qoysnimada u dhexaysa Ciise iyo Aabbaha (14:23; 17:1ff).

Falkan halkan lagu adeegsaday ee qaadan “*paralambanō*”, waxa macneheedu yahay “soo dhowayn.” Janadu waa weheshi shakhsi ahanaaneed oo lala yeesho Ilaah, waxaanay middani ka duwan tahay 1:12 (*lambano*). Waxaana adag sida labadan kelmadood lagu kala saaro, hadiyo goorna waa isku mid.

▣ **“meeshaan joogo, idinkuna aad joogtaan”** janadu waa meesha Ciise joogo (17:24)! Janadanu waa iyadoo is weheshi fool ka foola lala yeesho Ilaaha Saddexmidnimada ah! Axdiga Cusubi ma caddaynaya goorta uu uu yahay weheshiga buuxa.

1. dhimashada, 2 Korintos 5:8
2. Imaatinka Labaad ee Masiixa, 1 Tesaloniika 4:13-18

Kitaabku si layaableh ayuu uga aamusayaa waxa nolosha ka danbeeya. Kitaab si fiican uga hadlayay aah ah ka William Hendriksen, ee *The Bible On the Life Hereafter*.

MAWDUUC GAAR AH: XAGAY JIRAAN KUWII DHINTAY?

I. Axdiga Hore

A. Dadka oo dhammi waxay tegayaan *Sheol* (aan la hubin, BDB 1066), waana si loo tilmaamo dadka oo dhan oo dhimanaya xabaalna galaya, badanaana waxa loogu adeegsaday Suugaanta Xikmadda iyo Ishacyaah. Axdiga Hore dhexdiisa waxay ahayd waxaan caddayn, laakiinse ah jiritaan (Ayuub 10:21-22; 38:17; Sabuurka 107:10,14).

B. Qaabka *Sheol*

1. wax la xidhiidha xukunka Ilaah, Sharciga Kunoqoshadiisa 32:22
2. wax la xidhiidha ciqaabka ka horreeya maalintaa Qiyaamaha, Sabuurka 18:4-5
3. wax la xidhiidha Burburka Ilaah wax ku ciqaabo, Ayuub 26:6; Sabuurka 139:8; Caamoos 9:2
4. wax la xidhiidha xabaasha, Sabuurka 16:10; Ishacyaah 14:15; Yexesqeel 31:15-17
5. ku dhaadhicida *Sheol* iyadoo la nool yahay, Tirintii 16:30,33; Sabuurka 55:15
6. waxa lagu tilmaamay xayawaan leh af wayn, Tirintii 16:30; Ishacyaah 5:14; 14:9; Xabquuq 2:5
7. dadka halkaas waxa lagu magacabaay *Repha'im*, Ishacyaah 14:9-11

II. Axdiga Cusub

A. Erayga Cibraaniga ah ee *Sheol* waxa Giriigga loogu tarjumay *Hades* (dunida aan la arkayn)

B. Hades waxa qaabkeedu ahaa

1. tilmaamista dhimashada, Matayos 16:18
2. wax la xidhiidha dhimashada, Muujintii 1:18; 6:8; 20:13-14
3. waxa ay la mid tahay meel wax lagu ciqaabo (*Gehenna*), Matayos 11:23 (xigaho Axdiga Hore); Luukos 10:15; 16:23-24
4. waxay la mid tahay xabaasha, Luukos 16:23

C. waxa suurto gala in la qaybiyay (rabbaaniyiinta)

1. qayb wanaagsan oo ah janada (2 Korintos 12:4; Muujintii 2:7), Luukos 23:43
2. qayb xun oo loogu magac daray cadaab, 2 Butros 2:4, oo ah meel lagu tuuray malaa'igta sharka ah (Bilowgii 6; 1 Enoch)

D. *Gehema*

1. waxay ka tarjumaysaa erayo Axdiga Hore ah, “toggii wiilasha Hinnom” (koonfurta Yerusaaalem). Waxay ahayd meeshii ilaaha cadaabta ee Foyiniinta, *Molech* (BDB 574), waxaana lagu caabudi jiray qurbaan ilmo ah (2 Boqorradii 16:3; 21:6; 2 Korintos 28:3; 33:6), waxaana lagu mamnuucay Laawiyiintii 18:21; 20:2-5.
2. Yermiyaah ayaa ka bedelay meel jaahilnimada lagu caabudo waxaanu ka dhigay goobta

xukunka YHWH (Yeremyaah 7:32; 19:6-7). Waxay noqotay meesha cadaabta ee xukunka abidka ah sida ku sugan 1 Enoch 90:26-27 iyo Sib 1:103.

3. Yuhuuddii noolaa maalimihii Ciise waxa ay ka walaacsanaayeen awowyaashood oo ka qayb qaatay jaahiliyaddaas ilmaha qurbaan ahaanta loogu bixin jiray, waxaanay meesha ka dhigeen meel qashinka Yerusaalem lagu guro. Kuwo badan oo ka mid ahaa tusaalayaasha Ciise ee la xidhiidhi xukunka daa'imka ahina dhulkan ayay ku saabsanaayeen (dab, qiiq, dirxiyo, Markos 9:44,46). Erayga *Gehenna* waxa kelidiis adeegsaday Ciise (marka laga reebo Yacquub 3:6).

4. Adeegsiga Ciise ee *Gehenna*

a. dab, Matayos 5:22; 18:9; Markos 9:43

b. negaansho, Markos 9:48 (Matayos 25:46)

c. meel burbur (nafta iyo jidhkaba), Matayos 10:28

d. la mida *Sheol*, Matayos 5:29-30; 18:9.

e. waxa lagu tilmaamay xumaan "wiilka cadaabta" Matayos 23:15

f. natiijo xukun, Matayos 23:33; Luukos 12:5

g. fikirta *Gehenna* wuxuu la mid yahay dhimashada labaad (Muujintii 2:11; 20:6,14) ama warta dabka (Matayos 13:42,50; Muujintii 19:20; 20:10,14-15; 21:8). Waxa suurto gala warta dabku inay noqoto meel ay galaan dadka iyo malaa'igaha sharka lihi (cadaabta, 2 Butros 3:4; Yuudas aayadda 6 ama Luukos 8:31; Muujintii 9:1-11; 20:1,3).

h. looguma tala galin aadanaha, laakiin waxa loogu talo galay shaydaanka iyo malaa'igihisa, Matayos 25:41

E. waxa suurto gala in maadaama oo qayb ahaan laga sheegay *Sheol*, *Hades*, iyo *Gehenna* in

1. asal ahaan aadanaha oo dhami tegeen *Sheol/Hades*

2. khibradda halkaasi waxa xumaanaysaa qiyaamaha dabadiis, laakiinse meesha xumaanta sideeda ayay ahaanaysaa (waana sababta KJV uu *hades*(xabaal) ugu tarjumay *gehenna*(cadaab).

3. Meesha keliya ee Axdiga Cusub dhexdiisa laga sheegay xanuunka ka horreeya qiyaamuhu waxa weeyi masaalka Luukos 16:19-31 (Laasaros iyo ninkii hodanka ahaa). *sheol* sidoo kale waxa lagu sheegay meel ah ciqaabka imika (Sharciga Kunoqoshadiisa 32:22; Sabuurka 18:1-5). Si kastabana ha ahaatee, qofna masaal kuma asaasi karo caqiido.

III. Waxa u dhexeeya dhimashada iyo sarakicista

A. Axdiga Cusubi ma barayo "waaritaanka nafta" kaasi oo ahaa aragtiyihii dadkii hore ka aaminsanaayeen nolosha dabadeed.

1. Aadanaha naftooda waxay jirtaa ka hor noloshooda jidh ahaaneed

2. Aadanaha noloshooda waa daa'im ka hor iyo kaddib dhimashada jidh ahaaneed.

3. Hadiyo goor jidhkaha waxa loo arkaa xabsi iyadoo dhimashaduna tahay dib ugu noqoshada jiritaankii hore

B. Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa xaalad rooxaan ahaaneed oo u dhaxaysa dhimashada iyo sarakicista

1. Ciise wuxuu ka hadlayaa kala qaybsanaanta jidhka iyo nafta, Matayos 10:28

2. Ibraahim waxa laga yaabaa inuu imika haysto jidh, Markos 12:26-27; Luukos 16:23

3. Muuse iyo Eliyaas waxay lahaayeen jidh markii is beddelka, Matayos 17

4. Bawlos wuxuu sheegayaa Imaatinka Labaad in nafaha la jira Masiixu ay ugu horrayn heli doonaan jidh cusub, 1 Tesaloniika 4:13-18

5. Bawlos wuxuu sheegayaa in rumaystayaasha heli doonaan jidhkooda ruuxiga ah Maalinta Qiyaamaha, 1 Korintos 15:23,52

6. Bawlos wuxuu sheegayaa in rumaystayaashu aanay gali doonin *Hades*, laakiinse dhimashadaba ay kula joogaan Ciise, 2 Korintos 5:6,8; Filiboy 1:23. Ciise wuxuu ka adkaaday dhimashada iyadoo kuwa xaqa ahna uu u qaaday janada, 1 Butros 3:18-22.

IV. Jano

A. Eraygan saddex macne ayaa loogu dhex adeegsaday Kitaabka

1. Hawada ka sarraysa dhulka, Bilowgii 1:1,8; Ishacyaah 42:5; 45:18

2. Iftiinnada samada, Bilowgii 1:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 10:14; Sabuurka 148:4; Cibraaniyada 4:14; 7:26

3. Samooyinka Ilaah, Sharciga Kunoqoshadiisa 10:14; 1 Boqorradii 8:27; Sabuurka 148:4; Efesos 4:10; Cibraaniyada 9:24 (samo saddexaad, 2 Korintos 12:2)

B. Kitaabku muu muujinin wax ku saabsan nolosh dabadeed, maxaa yeelay aadanaha leexday ma awoodi karaan inay fahmaan (1 Korintos 2:9).

C. Janadu waxay isugu jirtaa meel (Yooxanaa 14:2-3) iyo shakhsi (2 Korintos 5:6,8). Janadu waxay noqon kartaa Beer Ceeden oo dib loo soo celiyo (Bilowgii 1-2; Muujintii 21-22). Dhulka waa la nadiifin doonaa oo la hagaajin doonaa (Falimaha Rasuullada 3:21; Rooma 8:21; 2 Butros 3:10). Ekaanshaha Ilaah (Bilowgii 1:26-27) waxa lagusoo celiyay Masiixa dhexdiisa. Iminkana weheshigii Beer Ceeden markale ayuu suurto gal yahay.

Si kastaba ha ahaatee, middani waxay noqon kartaa tusaale ahaan (janada wayn ee Muujintii 21:9-27) mana aha xaqiiqo. 1 Korintos 15 ayaa ku sheegaya farqiga u dhexeeya jidka la taaban karo iyo jidhka ruuxiga ah sida iniinyaha geed qaan gaadh ah oo kale. markalena, 1 Korintos 2:9 (lagasoo xigtay Ishacyaah 64:4 iyo 65:17) waa ballan qaad iyo rajo wayn! Waxaan ogahay marka aan isaga aragnona inaan sidiisa oo kale noqon doono (1 Yooxanaa 3:2).

V. Maraajic wanaagsan

A. William Hendriksen, kitaabkiisa *The Bible On the Life Hereafter*

B. Maurice Rawlings, kitaabkiisa *Beyond Death's Door*

14:4 “jidkaba waad taqaanniin.” Ciise hadalkiisani wuxuu Toomas ku sababay inuu ka shakiya aqoonaanta jidka. Ciise markaa wuxuu ugu jawaabay saddex eray oo in badan lagu adeegsaday Axdiga Hore.

14:6 “nigu waxaan ahay jidka” Axdiga Hore dhexdiisa, rumaysadka kitaabiga ah waxa lagu tilmaami jiray jidka nolosha (Sharciga Kunoqoshadiisa 5:32-33; 31:29; Sabuurka 27:11; Ishacyaah 35:8). Magacii kaniisaddii ugu horraysayna wuxuu ahaa “Jidka” (Falimaha Rasuullada 9:2; 19:9, 23; 24:14, 22). Ciise waxa uu adkaynayay in isagu uu yahay jidka keliya ee Ilaah loo mari karo, waana macnaha laga dhuuxi karo Injiilka Yooxanaa! Qaab nololeedka wanaagsani waxa uu caddayn u yahay rumaysadka shaqsi ahaaneed (Efesos 2:8-9, 10), mana aha macnaha xaqnimada. Eeg fiirada 8:12.

▣ **“runta”** erayga “run” faylosuufiyadda Giriigga dhexdeeda waxaa liddi isku ah “runta” iyo “beenta” ama “xaqiiqada” iyo “dhalanteed.” Si kastaba ha ahaatee, waxa jiray xer ku hadlaysay Aramaati kuwaasi oo u fahmay in Ciise uu ku hadlayo macnaha ay “runtu” ku samaynaso Axdiga Hore (Sabuurka 26:3; 86:11; 119:30). “runta” iyo “nolosha” labaduba waxay tilmaamaan “jidka.” Erayga “run” waxa badanaa lagu dhex adeegsaday Yooxanaa iyadoo la sheegayo shuqulka Ilaahiga ah (1:14; 4:23-24; 8:32; 14:17; 15:26; 16:13; 17:17, 19). Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55 iyo 17:3.

▣ **“nolosha”** waa sheegasho la yaab leh! Run ahaantii waxa muuqata in Ciise uu rumaysnaa in isaga oo keliya xidhiidh lagula yeelan karo Ilaah laguna ogaan karo (1 Yooxanaa 5:10-12). Waxaana middan lagu magacaabay waxa u gaarka ah Masiixiyadda. Waxaana jirta meel ay isugu soo biyo shubanayaan labadani. Hadalkanina waa run amaba Masiixiyaddu waa been! Siyaabo badan ayaa middani ay uula mid tahay Yooxanaa 10.

14:7 “haddaad” Waxa jira qoraal gacmeedyo ku kala duwan jumlad shuruudeedka. Qoraalka United Bible Societies ku wuxuu taageeraya jumlad shuruudeedda heerka koobaad ah, waana sida ay waafaqsan yihiin qoraal gacmeedyadii hore Giriigga ee P⁶⁶, a, iyo D. waxaana markaa tarjumaaddeedu noqonaysaa “haddaad itaqanaan, waad itaqanaane, markaana waad taqaanaan Aabbahay.”

Waxay noqon kartaa jumlad shuruudeed heerka labaad ah oo loogu yeedho “liddi ku ah xaqiiq.” Kaddib tarjumaaddu waxay noqonaysaa “haddii aad I gaartaan, imaydaan garanee, waxaad garan doontaan Aabbahay oo aydaan aqoon.” Waxa middan taageeraya qoraal gacmeedyada A, B, C, D^b, K, L, iyo X. haddaba, tani waa hadal adag maxaa yeelay waxaan filaynaa in Rasuulladu ay rumaysteen badbaadada Ciise iyo inuu yahay Masiixa uu soo diray YHWH. Xaqiiqadan ama runtan cusubina waxay ahayd mid iyaga ku adag inay fahmaan, waxaanay u muuqataa Injiilka Yooxanaa inuu ka hadlayo heerarka rumaysadka. Macnuhu markaas waxay u muuqataa inuu taageeraya jumlad shuruudeedka heerka labaad ah. Sidoo kale fiiro u yeelo xaaladda tan la midka ah ee aayadda 2 iyo 28.

▣ **“i garateen”** Ciise waxa uu la hadlayaa gebi ahaanbaa kooxdii Rasuullada marlabaad (aayadda 9). Erayga ah “garo” Axdiga Hore dhexdiisa waxa loogu adeegsaday isaga oo tusinaya macnaha xidhiidhka gaar ahaaneed, mana aha aqoon guud oo keliya (Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5).

▣ **“Aabbahayna waad garan lahaydeen.”** Ciise oo la arkaa waxay ka dhigan tahay Ilaah oo la arkay (Yooxanaa 1:14-18; 5:24; 12:44-45; 2 Korintos 4:4; Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:3)! Ciise waa muujinta dhammayska tiran ee Ilaaha aan muuqanin, mana jiro qof diida Ciise oo sheegan kara inuu Ilaah aqoon u leeyahay (1 Yooxanaa 5:9-12).

NASB (UPDATED) TEXT: 14:8-14

⁸Filibos baa ku yidhi, Sayidow, Aabbaha na tus, waana nagu filan yahay. ⁹Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Ma intaas badan baan idinla joogay, oo aanad i garanaynin, Filibosow? Kii i arkay wuxuu arkay Aabbaha. Sidee baad u leedahay, Aabbaha na tus? ¹⁰Miyaadan rumaysan inaan Aabbaha ku jiro, Aabbuhuna uu igu jiro? Erayadaan idinkula hadlayo, anigu iskagama hadlayo, Aabbahase igu jira ayaa shuqulladiisa sameeya. ¹¹I rumaysta inaan Aabbaha ku jiro, oo Aabbuhuna aniga igu jiro, haddii kale shuqullada aawadood ii rumaysta. ¹²Runtii. runtii. waxaan idinku leeyahay, Kii i rumaystaa, shuqullada aan sameeyo, Isna wuu samayn doonaa, oo shuqullo kuwan ka waaweynna wuu samayn doonaa, maxaa yeelay, Aabbahaan u tegayaa. ¹³Oo wax alla waxaad magacayga ku weydiisataan, waan samayn doonaa in Aabbuhu ku ammaanmo Wiilka. ¹⁴Haddii aad wax igu weydiisataan magacayga, waan samayn doonaa.

14:8 “Filibos baa ku yidhi” wuxuu rabay Filibos (1) muujinta Ilaah, sidii Muuse, Ishacyaah, ama Yexesqeel oo kale, ama (2) gebi ahaanba muu fahmin ereyadii Ciise. Ciise waxa uu ku jawaabayaa in haddii Filibos uu arkay oo gartay isga, inuu sidoo kalena arkay oo aqoonsaday Ilaah (Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:3)!

▣
NASB “nagu filan yahay”
NKJV “na kaafiyaa”
NRSV “waan ku qanci doonaa”
TEV “waa midda aan rabno”
NJB “markaana waan ku qanci doonaa”

Xertu waxa ay dooneen wax ansixin ama caddayn ah sidii Farrisiinta oo kale. haddaba, rumaystayaashu waa inay ku socdaan rumaysad ee maaha inay ku socdaan wax aragti ku tiirsan (2 Korintos 4:18; 5:7) oo la xidhiidhi arrimaha ruuxiga ah. Waxa keliya oo la rabaa waa kalsooni!

14:9 “Ma intaas badan baan idinla joogay, ” u fiirso hadala oo jamac ahaan ah. Filibos waxa uu waydiiyay su’aasha ay dhammaantood ka fikirayeen.

▣ **“Kii i arkay wuxuu arkay Aabbaha.”** Waa fal ebyan oo buuxa kaasi oo macnihiisu yahay “wuu arkay waanu sii arki doonaa.” Ciise waxa uu si buuxda u muujinayaa Ilaahnimada (Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:3).

14:10 Ciise su’aashiisu Giriigga waxa ay ku filaysaa “haa” jawaaba ah. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 2:10.

▣ **“idinku .. idinku”** ta ugu horraysaa waa keli, waxaanay sheegaysaa Filibos. Midda labaadna waa jamac oo waxa ay sheegaysaa Rasuullada oo dhan (aayadda 24; 5:19.30; 7:16-18; 8:28; 10:38; 12:49). Waxbarista Ciise waxa ay yihiin erayada Aabbaha (aayadda 24).

▣ **“Aabbahase igu jira ayaa shuqulladiisa sameeya.”** Is weheshigan u dhexeeya Aabbaha iyo Wiilku (7:6; 8:28; 10:38), kaasi oo lagu xoojiyay tukashada Ciise ee cutubka 17, waxay noqonaysaa “ku dhex jirista” rumaystayaasha ku jiraan Ciise sida ku sugan cutubka 15. Injiilka Yooxanaa badbaadada wuxuu u muujinayaa (1) iyadoo caqiido ah; (2) iyadoo weheshi ah; (3) iyadoo addeecitaan ah; iyo (4) iyadoo quduusnaan ah.

14:11 “ I rumaysta” waa fal taagan oo shaqaynaya ama fal taagan oo tusmayn ah (14:1).

Haddaba, waxa jira kala inay qoraal gacmeedyadu ku kala duwan yihiin erayada ay aayaddani ku bilaabmayso. Kuwo kamida qoraaladii hore ee Giriiggu (P⁶⁶, P⁷⁵, a, D, L, iyo W) waxay qorayaan falka “rumaysta” oo uu la socdo (*hoti*) “inuu,” taasi oo laga dheehan karo inay ahayd inay aqbalaan runta ku jirta Ciise iyo Aabbaha midowgooda. Kuwo kaloo ah iyaguna qoraaladii hore (MSS A iyo B) waxay raacinayaan “aniga,” taasi oo tusinaysa cidda ay tahay in la rumaysto. Culimada Giriigga ee United Bible Societies ku waxay rumaysan yihiin, in midda hore ay ahayd asalka (Bruce M. Metzger kitaabkiisa *A Textual Commentary on the Greek New Testament*, oo haysta ikhtiyaarka “B” kuna sheegaya [hubaal], p. 244). Badanaa tarjumaadaha casriga ahi waxay qaataan “aniga” laakiin waxay raaciyaan “inuu” (taasi oo tusinaysa cidda la rumaysnayo).

▣ **“haddii kale shuqullada aawadood ii rumaysta.”** Ciise wuxuu u sheegayaa inay ku rumaystaan shuqulladiisa (Yooxanaa 5:36; 10:25, 38). Shaqadiisu waxay buuxisay waxsii sheegistii Axdiga Hore, sidoo kalena waxay muujinaysaa cidda uu yahay! Rasuulladu sida inagoo kale, waxa ay ahayd inuu rumaysadkoodu koro.

14:12 “Runtii, runtii” eeg fiirada 1:51.

▣ **“rumaystaa... wuu samayn doonaa”** rumaysashadu maaha wax caqliga oo keliya ka shaqeeya laakiin waa hadal waxqabad ku dheehan yahay. Erayada ah “shuqullo kuwan ka waaweynna wuu samayn doonaa” waa tusmayn mustaqbal ah oo loo macnayn karo “wuxuu samayn doonaa waxyaalo kasii waawayn.” Tani waxa suurta gala inay sheegayso

1. Baaxadda juquraafi ahaaneed (Matayos 28:18-20)
2. Gaadhitaanka kuwa aan Yuhuudda ahayn
3. Ruuxa oo la jiri doona rumayste kasta
4. Tukashadii Ciise (Cibraaniyada 7:25; 9:24)

Eeg Mawduuca Gaarka ah: 1 Yooxanaa 3:22, B. 2.

Erayada danbe “wuxuu samayn doonaa” waa mid muhiim u ah Masiixiyadda. Sida Aabbuhu u diray Wiilka, ayaa Wiilkuna u diray xerta! Ku dhex jiritaanka Masiixu waxa ay ka dhigan tahay haysashada nolosha abidka ah, taasi oo laga rabo “adeegga wayn” in maanka iyo qalbigaba lagu hayo. Masiixiyaddu maaha waxa maalin roobaad lagu helo, laakiin waa mid ka muuqanaysa nolosha ahna aragti cusub oo dunida ku waajahan! Waxay bedelaysaa wax kasta, waana boqortooyo caalami ah oo ku dhisan qaab nololeed iyo naf isu huritaan.

Kaniisaddu waa inay dib usoo celiso

1. Adeegga rumayste kasta
2. Muhiimadda Adeegga Wayn
3. Adeeg maalinwalba ah oo ka madhan danaysi
4. La midnimada Masiixa ee imika!

14:13-14 “wax alla waxaad magacayga ku weydiisataan, waan samayn doonaa” u fiirso Ciise isaga oo sheeganaya inuu aqbali doono ducooyinkeenna taasi oo ku dhisan dabeecaddiisa. Falimaha Rasuullada 7:59 Istifanos wuxuu u tukanayaa Ciise. 2 Korintos 12:8 Bawlos wuxuu u tukanayaa Ciise. 15:16 iyo 16:23 rumaystayaashu waa inay la hadlaan Aabbaha. Magaca Ciise oo lagu tukadaa maaha qaab aan kusoo xidhno ducadeenna oo keliya, laakiin waa inaan ku tukano doonista iyo dabeecadda Ciise.

Kani waa tusaale wanaagsan oo loogu fiirsan karo aayadaha isku midka ah inta aynaan hadallo kitaabi ah aynaan sheeganin.

Waa in la isu dheelli tiro “haddii aan ku waydiisanayno”

1. “magacayga” (Yooxanaa 14:13-14; 15:7, 16; 16:23)
2. “ku way diisano” (Matayos 7:7-8; Luukos 11:5-13; 18:1-8)
3. “labo isku raacaan” (Matayos 18:19)
4. “rumaysanaya” (Matayos 21:22)
5. “ka shakiyin” (Markos 11:22-24; Yacquub 1:6-7)
6. “aan danaysi ahayn” (Yacquub 4:2-3)
7. “dhowr amarradiisa” (1 Yooxanaa 3:22)
8. “marka loo eego doonista Ilaah” (Matayos 6:10; 1 Yooxanaa 5:14-15)

Magaca Ciise wuxuu u taagn yahay dabiicaddiisa, waana si kale oo lagu tilmaamayo maanka iyo qalbiga Ciise. Erayadani waxay marwalba ka dhex muuqanayaan Yooxanaa (14:13-14, 26; 15:16; 16:23-26). Markasta oo qofku Ciise u dhowyahayna, waa markasta oo ducadiisa la ajiibo. Waxa ugu xun ee Ilaah ruux ahaan u qaban karo rumaystayaashu, waa aqbalitaanka waxyaalaha danaysinimadoodu ku jirto. Eef fiirada 1 Yooxanaa 3:22.

MAWDUUC GAAR AH: DUCADA WAX KU OOLKA AH

A. La xidhiidha xidhiidhka shakhsi ahaaneed ee qof la yeelan karo Ilaah Saddexmidnimada

1. La xidhiidha dooniska Aabbaha

a. Matayos 6:10

b. 1 Yooxanaa 3:22

c. 1 Yooxanaa 5:14-15

2. Ku dhex jirista Ciise

Yooxanaa 15:7

3. Ku tukashada Magaca Ciise

a. Yooxanaa 14:13,14

b. Yooxanaa 15:16

c. Yooxanaa 16:23-24

4. Ku tukashada Ruuxa

a. Efesos 6:18

b. Yuudas 6:20

B. La xidhiidha danaha shakhsi ahaaneed

1. Aan ka walaac lahayn

a. Matayos 21:22

b. Yacquub 1:6-7

2. Waydiisasho qaldan

Yacquub 4:3

3. Waydiisasho danaysnimo ah

Yacquub 4:2-3

C. La xidhiidha ikhtiyaarka shakhsi ahaaneed

1. Adkaysi

a. Luukos 18:1-8

b. Kolosay 4:2

c. Yacquub 5:16

2. Khilaafka guriga

1 Butros 3:7

3. Denbi

a. Sabuurka 66:18

b. Ishacyaah 59:1-2

c. Ishacyaah 64:7

Ducooyinka oodhan waa la aqbalaa, laakiin dhammaantood maaha wax ku ool. Ducadu waxay ku dhisantahay xidhiidh, waxa ugu xun ee Ilaah u aqbali karo rumaystayaashuna waa waxa aan haboonayn. Eeg Mawduuca Gaarka ah Kolosay 4:3. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 5:14.

MAWDUUC GAAR AH: MAGACA RABBIGA

Tani waxay ahayd weedh uu Axdiga Cusubi si guud ahaaneed ugu adeegsanayo la jiiigista shaqsi ahaaneed iyo awooddiisa firfircoonida leh ee triune ee Ilaaha runta ah kaniisadda dhexdeeda. Maysan ahayn arrin mucjiso leh oo lala yaabo, laakiin codsi ku aaddan ahaanshaha ama dabeecadda Ilaah.

Sia badan weedhani waxa ay Ciise ku muujinaysaa in uu yahay Rabbiga ayaa ah (cf. Filiboy 2:11)

1. Qirashada uu qofka rumaysadkiisa Ciisre Masiix ku qirto maqurinta ama baabtiiska (cf. Rooma 10:9-13; Falimaha Rasuulladaq 2:39; 8:12,16; 10:48; 19:5; 22:16, I Korintos 1:13,15; Yacquub 2:7)

2. Inuu wax ku saaro ama ku bixiyo (sida jinka) (Matayos 7:22; Maarkos 9:38; Luukos 9:49; 10:17;

Falimaha Rasuullada 19:13)

3. Inuu wax ku bogsiyo (cf. Falimaha Rasuullada 3:6,16; 4:10; 9:34; Yacquub 5:14)
4. In loo adeego (cf. Matayos 10:42; 18:5; Luukos 9:48)
5. Waqtiga ay kaniisaddu samaynayso edbinta (cf. Matayos 18:15-20)
6. Marka la wacdinayo kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. Luukos 24:47; Falimaha Rasuullada 9:15; 15:17; Rooma 1:5)
7. Tukashada dhexdeeda (cf. Yooxanaa 14: 13-14; 15:2,16; 16:23; I Korintos 1:2)
8. Waddo ay Masiixiyaddu ku si gudbi karto (cf. Falimaha rasuullada 26:9' I Korintos 1:10; II

☐ “**haddii**” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah taasi oo loogala jeedo waxqabad.

☐ “**wax alla waxaad magacayga ku weydiisataan,**” hadiyo goor rumaystayaasha waxa lagu dhiirri gelinayaa inay ku tukadaan Ruuxa, iyagoo Wiilka u maraya Aabbaha. Aayaddani waa meesha keliya ee Injiilka Yooxanaa dhexdiisa uu Ciise tukashada naftiisa ku jihatay.

Tani waa sababta kuwo badan oo ka mida qoraal gacmeedyada hore ee Giriiggu u dhaafayaan “aniga” (MSS, A, D, L, iyo kuwo ka mida Laatiinkii Hore, Vulgate, Coptic, Ethiopian, iyo Slavic versions). UBS⁴ ku wuxuu kusoo gudbinayaa “B” (hubaal). Waxay koobsanaysaa iyana MSS P⁶⁶, P⁷⁵, a, B, W, iyo kuwo ka mida Laatiinkii Hore, Valgate, iyo Siiriyaanka.

NASB (UPDATED) TEXT: 14:15-17

¹⁵Haddii aad i jeceshihiin, qaynuunnadayda waad xajin doontaan. ¹⁶Aniguna Aabbahaan baryi doonaa, isna wuxuu idin siin doonaa Gargaare kale inuu idinla jiro weligiin, ¹⁷waxaa weeye, Ruuxa runta ah oo aanay dunidu qaadan karin, waayo, ma aragto, garanna mayso, idinkuse waad garanaysaan, waayo, wuu idinla jiraa, wuuna idinku jiri doonaa.

14:15 “Haddii aad i jeceshihiin, qaynuunnadayda waad xajin doontaan.” Waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah taasi oo ka hadlaysay waxqabad. Jacaylka Ilaah ee lagu jeclaado Masiixa waxa lagusoo bandhigaa addeecitaan. “xajin” waa mustaqbal loo adeegsaday sidii fal amar ah oo jooga (Friberg, *Analytical Greek New Testament*, p337). Addeecitaanku aadbuu muhiim u yahay (8:51; 14:21, 23-24; 15:10; 1 Yooxanaa 2:3-5; 3:22, 24; 5:3; 2 Yooxanaa 6:46). Aayadaha 21, 23, iyo 24 waxa ay xoojinayaan xaqiiqadan mid la mid ah addeecitaankuna waxa uu caddayn u yahay raacitaanka runta ah (Yacquub iyo 1 Yooxanaa).

NKJV wuxuu dhigayaa amarka ah “xoojiya qaynuunnadayda,” oo ay taageerayaan MSS A, D, W, Vulgate, iyo kuwo badan oo ka mid ahaa wadaaddadii kaniisadda. UBS⁴ ku isna wuxuu dhigayaa mustaqbalka tusmaynta ah “C” iyadoo (go’aan ka gaadhisteedu adagtahay), waxaana taageeraya MSS B, L, iyo Qibtiga, iyo sidoo kale wadaaddado kaniisadeed.

14:16 “wuxuu idin siin doonaa” eeg fiirada 14:26.

☐

**NASB, NKJV, TEV
NRSV
NJB**

“Gargaare kale”

“caawiye kale”

“kaalmeeye kale”

Erayga ah “kale” waxa Giriigga ay ku noqonaysaa (*allos*) oo la macno ah “waxkaloo la cayn ah.” Ruuxa Quduuska ah waxa loogu yeedha “Ciisaha kale” (G. Campbell Morgan, eeg Mawduuca Gaarka ah ee hoos ku xusan).

Erayga labaad isna waxa Giriigga uu ku yahay “*paraklētōs*” kaasi oo loo adeegsaday Ciise sida ku xusan 1 Yooxanaa 2:1 iyo Ruuxa Quduuska ah sida ku xusan Yooxanaa 14:26 iyo 16:7-14. Macnihiisu waxa weeyi “mid gargaar la garab taagan.” Haddaba, caawiye ama taageero ayaa iyadu ah macnaha saxda ah ee eraygan. Qaabkeeda kale ee isna asalkiisu yahay Giriigga oo ah “raaxeeye” (*parakalēō*), waxa Aabbaha loogu dhex adeegsaday 2 Korintos 1:3-11.

Tarjumaadda magaca “caawiye” (*paraklētōs*) wuxuu ka imanayaa nidaam sharciyeedkii Roomaanka. Tarjumaadda “raaxeeye” waa ugu horrayn adeegsaday Wycliffe waana adeegsiga qaabka falka ah (*parakaleō*)

Sebtujantiga dhexdiisa (Ishacyaah 33:7; 35:4; 61:1-2; 66:10-19, eeg NIDOTTE, vol, 1, p. 570). Waxaanay noqon kartaa mid lagu magacaabi karo Shaydkaanka.

Philo iyo Josephus labaduba eraygan waxay u adeegsadeen iyadoo macnihiisu yahay “la taliye.”

MAWDUUC GAAR AH: MASIIXA IYO RUUXA

Waxaa kala jira isbeddello u dhexeeya shaqada Ruuxa iyo Shaqada Wiilka. G. Campbell Morgan wuxuu sheegay in magaca ugu wanaagsan ee Ruuxu uu yahay “Kan kale ee ah Masiixa.” Kuwan soo socda waxa ay sawir is barbar dhigeed ka bixinayaan shaqada iyo magaca Wiilka iyo ruuxa.

1. Ruux loogu yeeray, “Ruuxa Ciise” ama in ay isku qeexid yeeshaan (cf. Rooma. 8:9; II Korintos 3:17; Galatiya. 4:6; I Butros. 1:11).
2. Iyadoo labadaba isku qaabab loo sheegayo
 - a. “runta”
 - 1) Ciise (Yooxanaa 14:6)
 - 2) Ruuxa (Yooxanaa 14:17; 16:13)
 - b. “Qariin ama u doode”
 - 1) Ciise (I Yooxanaa 2:1)
 - 2) Ruuxa (Yooxanaa 14:16,26; 15:26; 16:7)
 - c. “Qudduus”
 - 1) Ciise (Luukos 1:35; 4:34)
 - 2) Ruuxa (Luukos 1:35; 4:34)
3. Labaduba waxay dhex deggan yihiin kuwa rumaysadka leh dhexdooda
 - a. Ciise (Matayos. 28:20; Yooxanaa. 14:20,23; 15:4-5; Rooma. 8:10; II Korintos. 13:5; Galatiya. 2:20; Efesos. 3:17; Kolosay. 1:27)
 - b. Ruuxa (Yooxanaa 14:16-17; Rooma. 8:9,11; I Korintos.3:16; 6:19; II Timoteyos. 1:14)
 - c. Iyo sidoo kale Aabbaha (Yooxanaa 14:23; II Korintos 6:16)

▣ **“inuu idinla jiro weligiin,”** saddex meeleeeye oo kala duwan ayaa loo adeegsaday Ruuxa Quduuska ah sheegitaankiisa.

1. “*meta*” (aayadda 16), “la jiris”
2. “*para*” (aayadda 17), “udhow”
3. “*en*” (aayadda 17), “dhex”

U fiirso Ruuxa Quduuska ahi inuu inala jiro, inoo dhowyahay, iyo inuu inagu dhex jiro. Shaqadiisu waxa weeyi inuu nolosha Ciise ka dhex muujiyo rumaystayaasha, waxaanu la joogi doonaa iyaga ilaa iyo dhammaadka wakhtiga (aayadda 18; Matayos 28:20).

U fiirso iyada oo Ruuxa lagu magacaabay “Isaga.” Waxaanay tusinaysaa shakhsnimada Ruuxa. Hadiyo goor KJV Ruuxa waxa loogu yeedhay “it/magac uyaalka loo adeegsado wixii aan dad ahayn” laakiin tani waxa weeyi erayga “ruux” oo Giriiggana ku ah NEUTER (Yooxanaa 14:17, 26; 15:26). Isagu waa shakhsiga saddexaad ee Saddexmidnimada, waxaanu ka qayb yahay saddexda midow. Ilaah waa mid keliya oo isku muujiyay saddex qaab (eeg Mawduuca Gaarka ah 14:26, Matayos 3:16-17; 28:19; Falimaha Rasuullada 2:33-34; Rooma 8:9-10; I Korintos 12:4-6; 2 Korintos 1:21-22; 13:14; Efesos 1:3-14; 2:18; 4:4-6; Tiitos 3:4-6; I Butros 1:2). Wax ku saabsan “weligiin” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 6:58.

14:17 “Ruuxa runta” “run” waxay la macno tahay midda aayadda 6 (15:26; 16:13; I Yooxanaa 4:6). Eeg Mawduuca Gaarka ah ee ku saabsan Runta 6:55 iyo 17:3. Waxa uu kasoo horjeeda Shaydaanka oo ah aabbaha beenta (8:44).

▣ **“oo aanay”** kani waa NEUTER waafaqaya erayga “ruux” (*pneuma*). Si kastaba ha ahaatee, meelkasta Giriigga waxa loogu adeegsaday magac u yaal ahaan (aayadda 26; 15:26; 16:7, 8, 13, 14). Ruuxa Quduuska ahi maaha lab iyo dheddig toona, laakiinse waa ruux. Sidoo kale waxa muhiim ah in shakhsi lagu tiriyay (eeg Mawduuca Gaarka ah 14:26).

▣ **“dunidu qaadan karin”** Ruuxa Quduuska ahi wuxuu gaar u ayahay kuwa rumaysta Masiixa oo keliya (1:10-12). Waxa uu siiyaa waxkasta oo rumaystuhu u baahan yahay (Rooma 8:1-11). Dunida aan rumaysadka lahayni

(kosmos eeg Mawduucan Gaarka ah) ma fahmi karto ama ma qadarin karto waxyaalaha ruuxiga ah (1 Korintos 2:14; 2 Korintos 4:4).

MAWDUUC GAAR AH: ADEEGSIGA BAWLOS EE KOSMOS (DUNI)

Bawlos erayga *kosmos* siyaabo dhowra ayuu u adeegsanayaa

1. Makhluuqaadka abuurkooda (Rooma 1:20; Efesos 1:4; 1 Korintos 3:22; 8:4,5)
2. Dhulkan (2 Korintos 1:17; Efesos 1:10; Kolosay 1:20; 1 Timoteyos 1:15; 3:16; 6:7)
3. Aadanaha (1:27-28; 4:9,13; Rooma 3:6,19; 11:15; 2 Korintos 5:19; Kolosay 1:6)
4. Aadanaha oo u shaqayanaya si ka gees ah Ilaah (1:20-21; 2:12; 3:19; 11:32; Galatiya 4:3; Efesos 2:2,12; Filiboy 2:15; Kolosay 2:8,2-24). Waxaanay aad uula mid tahay adeegsiga Yooxanaa (1 Yooxanaa 2:15-17)
5. Dunidan qaabkeeda (7:29-31; Galatiya 6:14, la mida Filiboy 3:4-9, halkaasoo Bawlos uu ku sheegayo qaababka Yuhuudda)

Dhinacyada qaar ayaa ay ka qarsoontahay waxaana adag in adeegsi kasta lagarto. Eraygani marka loo eego fikirka Bawlos, macneheedu wuxuu noqonayaa kolba waxa jooga mana aha wax la xidhiidha wax hore loo sii qeexay. Eray bixinta Bawlos waxay ahayd sida dadaadka (James Stewart kitaabkiisa *A Man in Christ*). Isagu iskumuu dayayn inuu dejiyo fiqi laakiin wuxuu ku baaqayay Masiixa, oo wax kasta bedela!

▣ **“garato...garato”** waa markale oo Yooxanaa adeegsanayo labo labada. Macnaheeda Cibraaniguna waxa uu ka tarjumayaa xidhiidh gaar ah (Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5). Xagga Giriiggana waa aqoon. Injiilkuna wuxuu isugu jiraa shakhsi ahaan iyo aqoonsasho.

▣ **“wuu idinla jiraa”** la jiritaanku waa fikir aad uga dhex muuqanaya Yooxanaa qoraalladiisa (cutubka 15, eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 2:10). Aabbuhu wuxuu la jiraa Wiilka, Ruuxuna wuxuu la jiraa rumaystayaasha, rumaystayaashuna waxay la jiraan Wiilka. Jiritaanku waa fal taagan, mana aha go’aan keli meel taagan ama jawaab ku dhisan caadifad.

▣ **“wuuna idinku jiri doonaa.”** Waxa middan loo fahmi karaa “idinla socda” (jamac, NRSV tusmayn) ama “dhexdiina” (jamac, NASB, NKJV, NRSV, TEV iyo NJB). Ku dhex jiritaanka rumaystaha ee Ilaah waa ballan qaad cajiib leh. Axdiga Cusubina waxa uu sheegayaa in saddexda shakhsi ee Saddexmidnimadu ay ku dhex jiraan rumaystayaasha.

1. Ciise (Matayos 28:20; Yooxanaa 14:20, 23; Rooma 8:10; 2 Korintos 13:5; Galatiya 2:20; Efesos 3:17; Kolosay 1:27)
2. Ruuxa (Yooxanaa 14:16-17; Rooma 8:11; 1 Korintos 3:16; 6:19; 2 Timoteyos 1:14)
3. Aabbaha (Yooxanaa 14:23; 2 Korintos 6:16)

NASB (UPDATED) TEXT: 14:18-24

¹⁸Idiinkama tegi doono agoonnimo, ee waan idiin imanayaa. ¹⁹In yar dabadeed dunidu i arki mayso mar dambe, idinkuse waad i arkaysaan. Waan noolahay, taas aawadeed idinkuna waad noolaan doontaan. ²⁰Maalintaas waxaad garan doontaan inaan Aabbahay ku jiro, idinna aad igu jirtaan, anna aan idinku jiro. ²¹Kii qaynuunnadayda haysta oo xajiya, waa kaas kan i jecel, kan i jecelna Aabbahay waa jeclaan doonaa, anna waan jeclaan doonaa, waana isu muujin doonaa isaga. ²²Yuudas (Yuudas Iskariyot ma aha) ayaa ku yidhi isaga, Sayidow, maxaa dhacay oo annaga aad isugu kaaya muujin doontaa, dunidana aadan isugu muujin doonin? ²³Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Haddii nin i jecel yahay, hadalkayguu xajin doonaa, Aabbahayna waa jeclaan doonaa, oo waannu u iman doonnaa, waanna la joogi doonnaa. ²⁴Kii aan i jeclayn, hadalkayga ma xajiyo: hadalkaad maqlaysaanna kayga ma aha, laakiin waxaa leh Aabbaha i soo diray.

14:18 “Idiinkama tegi doono agoonnimo, ee waan idiin imanayaa.” Ciise ballan qaadkasta oo xerta uu u sameeyay waa uu oofiyay kaddib markii ay dhammaatay Kormariddu, isaga oo markuu soo sara kacay iyaga u

muuqday (20:19-31). Si kastaba ha ahaatee, kuwo ka mida mufasiriinta ayaa qaba in macnuhu uu sheegayo imaatinka Ruuxa ee maalintii Bentakostiga (Falimaha Rasuullada 2) amaba Imaatinka Labaad (aayadda 3).

14:19 “In yar dabadeed dunidu i arki mayso mar dambe, idinkuse waad i arkaysaan.” Aayadda 20 ayaa waxay tusinaysaa in middani ay sheegayso soo sarakicista Ciise. Waa hadalka uu Yuudas aayadda 22 dhexdeeda su’aasha kale ugu waydiinayo Ciise. Xertu waxay isaga ka filayeen inuu dhidibbada u aaso boqortooyadii Masiixa (Matayos 20:20-28; Markos 10:35-45) middani iyaga way jiha wareerisay markuu yidhi “dunidu I arki mayso.” Ciise jawaabtiisii uu siiyay Yuudas (maaha Iskariyod) ee aayadaha 23 iyo 24 waxay ahayd inuu naftiisa ka dhex muujin doono rumaystayaasha, oo dadkuna iyaga ka dhex arki doonaan Isaga!

▣ **“Waan noolahay, taas aawadeed idinkuna waad noolaan doontaan.”** Sarakicista Ciise waxay ahayd awoodda Ilaah iyo doonista uu ku rabay inuu bixiyo nolosha (Rooma 8:9-11; 1 Korintos 15:20-23, 50-58).

14:20 “Maalintaas” waxa loo adeegsaday macnaha maalin gaar ah (eeg Mawduuca Gaarka ah ee hoos ku xusan), laakiin waxa laga yaabaa halkan in loogala jeedo maalintaa soo sarakicista iyo muuqashada Ciise amaba maalinta uu iman doono Ruuxu ee Bentakostiga.

MAWDUUC GAAR AH: MAALINTAAS					
Eraygan ah “maalintaas” waxay ahayd si ay nebiyadii qarnigii siddeedaad uga hadli jireen booqashada Ilaah iyo joogitaankiisa maalintaa qiyaamaha iyo sarakicista.					
	○ Hoosheeca		Caamoos		Miikaah
Hubaal	Diidmo	Hubaal	Diidmo	Hubaal	Diidmo
1:11	1:5		1:14 (2)		2:4
	2:3		2:16		3:6
2:15			3:14	4:6	
2:16			3:18(2)		5:10
2:21			3:20		7:4
			6:3	7:11(2)	
			8:3	7:12	
			8:9(2)		
			8:10		
		9:11	8:13		

Kani waa tusaalaha nebiyada. Haddaba, Ilaah denbiga wakhti ayuu wax ka qaban doonaa, laakiinse sidoo kale waxa uu bixiyaa maalin towbad keenka iyo cafisku diyaar ugu yahay kuwa diyaarka u ah inay bedelaan nafhooda. Ujeedada Ilaah ee ku saabsan badbaadaduna waxay noqon doontaa mid la dhammays tiro! Waxa uu haysan doona dad isaga dabeecaddiisa ka tarjuma oo muujiya, iyada oo markaasna ujeedada is weheshiga ah ee u dhaxaysa aadanaha iyo Ilaah ay noqon doonto mid la dhammaystiro.

▣ **“waxaad garan doontaan”** marwalba erayga “garo” xagga Cibraaniyada waxa ay tusinaysaa xidhiidh gaar ahaaneed, laakiinse halkan waxa la socota “inaan” (*hoti*), taasi oo caddaynasa ujeedada. Eraygani sida “rumays” oo kale waxa uu leeyahay labo macne. Haddaba, Yooxanaa si uu Injiilka uga hadlo ayuu ereyadan u adeegsanayaa. Rumaystayaasha way garanayaan isaga (rumaysan yihiin), sidoo kalena waxay ogsoonyihiin runta isaga ku jirta. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23.

▣ **“inaan Aabbahay ku jiro, idinna aad igu jirtaan, anna aan idinku jiro”** Yooxanaa marwalba waxa uu xoojinayaa midaynta Ciise iyo Aabbaha (10:38; 14:10-11; 17:21-23). Waxa aanu raacinayaa xaqiiqada ay Aabbaha iyo ciise wadaagaan, iyo sidoo kale midda ay wadaagaan Ciise iyo kuwa isaga raacaa (Yooxanaa 17)!

14:21 “Kii qaynuunnadayda haysta oo xajiya, ” Waa laba fal oo taagan. Addeecitaanku waa muhiim (eeg fiirada aayadda 15). Waxa weeyi caddaynta raacitaanka runta ah (aayadda 23).

Rasuulladu waxay ahaayeen Yuhuud waxaanay marwalba qoraalladooda u adeegsan jireen waxyaalo la xidhiidha Yuhuudda. Ducada Yuhuudda ee wakhti wal oo caabudaad ah la samayn jiray waxay ahayd Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-5, mid lagu magacaabo *shema*, taasi oo macneheedi yahay “maqal sida aad yeesho”! Tanina waa ujeedada faallada Yooxanaa (Yacquub 2:14-26).

▣ **“waana isu muujin doonaa isaga.”** Tani waxa sheegaysaa mida ahaan (1) sarakicidda iyo muuqashada Ciise (Falimaha Rasuullada 10:40-41) ama (2) soo diritaanka Ruuxa Qoduuska ah si uu rumaystayaasha dhexdooda uuga muujiyo Masiixa (aayadda 26; Rooma 8:29; Galatiya 4:19).

Ciise waxa uu rumaysnaa oo sheegay inuu (1) metalayo; (2) ku hadlayo; iyo (3) inuu muujinayo Aabbaha. Xagga rumaystayaasha ereyadan adaga ee Masiixu ku hadlay waxa u diiwaan geliyay Rasuullada iyaga ayaana ah meesha aan ka heli karno warbixinta iyo macluumaadka ku saabsan Ilaah iyo ujoodooyinkiisa. Rumaystayaashu waxa ay qirayaan in awoodda Ciise iyo Qorniinku ayaa yihiin waxa ugu xooggan ee ay haystaan.

Waxa jira xidhiidh u dhexeeya shaqada Ruuxa iyo Wiilka . G. Campbell Morgan ayaa sheegay in magaca ugu wanaagsan ee lagu magacaabi karo Ruuxu inuu yahay “Ciisaha kale.” Eeg Mawduuca Gaarka ah 14:16.

14:22 Eeg fiirada aayadda 19.

▣ **“Yuudas (Yuudas Iskariyot ma aha)”** waa magacii kale ee Tadayos (Matayos 10:3; Markos 3:18). Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:45.

14:23 “haddii” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah kana hadlaysay waxqabad. Jacaylka ay xertu u qabaan Ciise waxa laga arki doonaa jacaylka ay iyagu dhexdooda isugu qabaan (aayadaha 15, 21).

14:24 “idinku” su’aashu waxa ay tahay “yaa ay tilmaamaysaa ‘idinku’ dani?” naxwe ahaan magac u yaalku waa falka, “maqalaysaan” (fal taagan oo tusmayn ah, jamac shaqsiga labaad ah). Waxa ay sheegi kartaa

1. Dadka dunida ee diida fariinta Ciise
2. Xertu markay aqbalaan erayada Ciise waxa ay ka dhignan tahay iyagoo aqbalay erayada Aabbaha (aayadaha 10-11).

NASB (UPDATED) TEXT: 14:25-31

²⁵Waxyaalahaas ayaan idinkula hadlay intaan idinla joogay, ²⁶laakiin Gargaaraha Ruuxa Qoduuska ah oo Aabbuhu ku soo diri doono magacayga, wax kasta ayuu idin bari doonaa, wuxuuna idin xusuusin doonaa wax kasta oo aan idinku idhi. ²⁷Nabad baan idiinka tegayaa, nabaddaydana waan idin siinayaa, sida dunidu u siiso anigu idiin siin maayo. Qalbigiinnu yuusan murugoon, yuusanna biqin. ²⁸Waad maqasheen inaan idinku idhi. Waan tegayaa, waanan idiin imanayaa. Haddaad i jeclaateen, waad farxi lahaydeen, waayo, Aabbahaan u tegayaa, maxaa yeelay, Aabbuhu waa iga weyn yahay. ²⁹Haatan waxaan idiinku sheegay intaanay dhicin, in markay dhacaan aad rumaysataan. ³⁰Mar dambe wax badan idinlaha sii hadli doono, maxaa yeelay, kan madaxda dunida ahu wuu imanayaa, isaguna waxba iguma laha. ³¹laakiin tani waa in dunidu ku garato inaan Aabbaha jeclahay iyo inaan sameeyo sida Aabbuhu igu amray. Kaca, aynu meeshan ka tagnee.

14:25 “Waxyaalahaas” waxa ay noqon kartaa inay sheegayso waxbaristii markay joogeen qolka (cutubyada 13:17, laakiinse waxa si gaara uga muuqanaysaa aayadaha 15:11; 16:1, 4, 6, 25, 33).

14:26 “Ruuxa Qoduuska” magaca qofka saddexaad ee Saddexmidnimadu waxa uu Yooxanaa kaga soo dhex aroorayaa keliya 1:33; 20:22, iyo halkan (eeg Mawduuca Gaarka ah: 1 Yooxanaa 2:20). Laakiinse, magacyo kale ayaa Yooxanaa dhexdiisa loogu yeedhay (gargaaraha, Ruuxa Runta, Ruuxa).

Waxa jira aayado badan oo Axdiga Cusub dhexdiisa ah isla markaasna Ruuxa ku tilmaama erayo shakhsi ahaaneed (Markos 3:29; Luukos 12:12; Yooxanaa 14:26; 15:26; 16:7-15, eeg Mawduuca Gaarka ah ee soo socda). Waxa jira qoraallo kale oo magac u yaalka ah NEUTER loogu adeegsaday Ruuxa sababtuna waa erayga Giriigga ah ee ruux (*pneuma*) waa NEUTER (14:17; Rooma 8:26).

Sidoo kale meeshan iyada ah eraygu waxa uu ku saabsan yahay Saddexmidnimada. Erayga “saddexmidnimo” maaha eray kitaabi ah, laakiinse waxa jiro aayado badan oo ka hadlayay saddexda siyaabood ee lagu arkay Ilaaha runta ah (eeg Mawduucan Gaarka ah ee hoos ku xusan). Haddii Ciise ku sifoobay Ilaahnimo ruuxuna waa shakhsi, fiqi ahaanna way midaysan yihiin (Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-6), waxaan ku qasbanahay inaan ku sheegno saddex-midaysan!

MAWDUUC GAAR AH: SADDEX MIDNIMADA

Waa in aad xusuusnaataa dhammaan wax qabadyada saddexda shaqsi ee saddex midnimada. Ereyga “Saddex midnimdo,” waxaa asal ahan laga soo qaatay Tertulian, Laakiin ma aha erey Kitaabka Qudduuska ah ku jira, ujeedkuse waa pervasive

- A. Injiilka
 - 1. Matayos 3:16-17; 28:19 (iyo kuwa la socda)
 - 2. Yooxanaa 14:26
- B. Falimaha Rasuullada – Falimaha Rasuullada 2:32-33,38-39
- C. Bawlos
 - 1. Rooma 1:4-5; 5:1,5; 8:1-4,8-10
 - 2. I Korintos 1:8-10; 12:4-6
 - 3. II Korintos 1:21; 13:14
 - 4. Galatiya 4:4-6
 - 5. Efesos 1:3-14,17; 2:18; 3: 14-17; 4:4-6
 - 6. I Tesaloniika 1:2-5
 - 7. II Tesaloniika 2:13
 - 8. Tiitos 3:4-6
- D. Butros – I Butros 1:2
- E. Yuudas – aaydaha 20-21

Tani sidoo kale way ku sharraxan tahay Axdigii Hore

- A. Ereyada sida jamaca ah Ilaah loogu magacaabo
 - 1. Magaca *Elohim* waa jamac ama plural, laakiin marka Ilaah loo adeegsanayo waa erey keligii ah oo aan wax badan tilmaamayn
 - 2. “Annaga” waxa ay ku jirtaa Bilowgii 1:26-27; 3:22; 117
- B. Malaa’igta Rabbigu waxa ay ahayd wakiil loo jeedo u ahayd Ilaah
 - 1. Bilowgii 16:7-13; 22:11-15; 31:11,13; 48:15-16
 - 2. Baxniintii 3:2,4; 13:21; 14:19
 - 3. Xaakinnadii 2:1; 6:22-23; 13:3-22
 - 4. Sakariyaah 3:1-2
- C. Ilaah iyo Ruuxu way kala soocan yihiin, Bilowgii 1:1-2; Sabuurrada 104:30; Ishacyaah 63:9-11; Yexesqeel 37:13-14
- D. Ilaah (YHWH) iyo Masiixa (*Adon*) way kala soocan yihiin, Sabuurrada 45:6-7; 110:1; Sakariyaah 2:8-11; 10:9-12
- E. Masiix iyo Ruuxu waa kala soocan yihiin, Sakariyaah 12:10
- F. Dhammaan saddexdaba waxaa lagu sharraxay Ishacyaah 48:16; 61:1

Ilaahnimada Ciise iyo shaqsi ahaanshaha Ruuxu waxay dhibaatooyin ku keeneen hab sami u socodkii, monotheistic, rumaystayaashii ugu horreeyay:

- 1. Tertullian—Sida Wiilku iga hooseeyo Aabbaha
- 2. Origen—kala hoosaynta nolosha Ilaahiyanka ah ee Wiilka iyo Ruuxa.
- 3. Arius—Diidista Ilaahnimada Wiilka iyo Ruuxa
- 4. Monarchianism- Ilaah oo jiritaankiisa si adag loo rumaysto

Saddex midnimadu waa hab si taariiq ahaaneed loo soo arkay oo horumar u sameeyay oo lagu arkay waxa uu Kitaabka Qudduuska ahu ka kooban yahay

- 1. Ilaahnimada buuxda ee Ciise, oo la mid ah Aabbaha, waxaa caddeeyay golihii Nicca 325 A. D.
- 2. Shaqsiyadda kaamilka ah iyo Ilaahnimada Ruuxa oo la mid ah aabbaha iyo Wiilka waxaa qeexay golihii Constantinople (381 A. D.)
- 3. Madhabta saddex midnimada waxaa si buuxda loogu qeexay Augustine shaqadiisii, *de Trinitate* Sida runta ah waxaa halkan yaal yaabab run ah. Laakiin Axdiga Cusub wuxuu adkaynayaa hal jiritaan oo weyn oo kala ah saddex shaqsi oo weligood muuqaal shaqsi ahaaneed lahaa.

▣ **“oo Aabbuhu ku soo diri doono”** waxa jiray dood ka dhex taagnayd kaniisaddii hore (qarnigii afraad) taasi oo ku saabsanayd haddii Ruuxu uu ka yimid Aabbaha (Yooxanaa 3:34; 14:16; 16:26) ama Wiilka (Yooxanaa 15:26; 16:7; Luukos 24:49; Falimaha Rasuullada 2:33). Arrinta fiqi ahaaneed ee ka dhex taagnayd Ariyaas ka - Atanasiyas ku waxay ahayd dood ku saabsan sinaanshaha iyo ilaahnimada u dhexaysa Aabbaha iyo Ciise oo ah Wiilka.

▣ **“wax kasta ayuu idin bari doonaa”** Ruuxu rumaystayaasha ma barayo dhammaanba dhinacyada aqoonta, laakiin wuxuu barayaa xaqiiqada ama runta ruuxiga ah, gaar ahaan xidhiidhka ku saabsan shakhsiyadda Ciise iyo shaqadiisa oo ah injiilka (16:13-14; 1 Yooxanaa 2:20, 27).

MAWDUUC GAAR AH: SHAQSI AHAANSHAHA RUUXA

Axdiga Hore dhexdiisa “Ruuxa Ilaah” (*ruach*) waxa uu ahaa awood dhammays tirta YHWH ujeedadiisa, laakiin ma jirto wax tusinaya intaasi ahayd shaqsi ahaan. Si kastaba ha ahaatee, Axdiga cusub dhexdiisa shaqsiyadda iyo shaqsi ahaansha Ruuxa Qudduuska ah oo buuxda ayaa ku diwaan gashan.

1. Waa lagu aflagaaddoona karaa (cf. Matayos 12:31; Markos 3:29)
2. Wax buu baraa (cf. Luukos 12:12; Yooxanaa 14:26)
3. Marqaati ayuu furaa (cf. Yooxanaa 15:26)
4. Qirashuu sameeyaa, waa hage (cf. Yooxanaa 16:7-15)
5. Waxaa loogu yeeraa “kuma” (i.e., *hos*) (cf. Efesos 1:14)
6. Waa laga caraysiin karaa (cf. Efesos 4:30)
7. Waa la qancin karaa (cf. I Tesaloniika 5:19)

Qoraallada saddexmidnimadu sidoo kale way ka hadlaan saddexda qof

1. Matayos 28:19
2. II Korintos 13:14
3. I Butros 1:2

Ruuxu wuxuu la xiriirsan yahay waxqabadyada aadanaha.

1. Falimaha Rasuullada 15:28
2. Rooma 8:26
3. I Korintos 12:11
4. Efesos 4:30
5. I Tesaloniika 5:15

Bilowga ugu horreeya ee Falimaha Rasuullada Dooraka Ruuxu so xooggan ayuu ugu sharraxan yahay. Maalintii ruuxu soo degay ma ahayn bilowgii shaqadii Ruuxa, laakiin cutub cusub. Ciise had iyo goor Ruuxa wuu watay. Baabtiiskii ama maqurintiisii ma ahayn bilowgii shaqadii Ruuxa, laakiin cutub cusub. Luukos wuxuu kaniisadda u diyaariyey boq cusub oo adeegga firfircooni u lahaa. Weli ujeedku waa Ciise Masiix, Ruuxu waa macnaha wax tarka leh oo ka turjumaya jacaylka Aabbaha, cafiska, iyo dib u soo celinta aadaniihi isaga aragiisa laga abuuray ayaa yoolku yahay!

▣ **“wuxuuna idin xusuusin doonaa wax kasta oo aan idinku idhi.”** Ujeedooyinku Ruuxu waxa weeyi:

1. Inuu xukumo aadanaha denbiilayaasha ah
2. Inuu u keeno Masiixa
3. Inuu ku baabtiiso magaca Masiixa
4. Inuu dhexdooda ka muujiyo Masiixa
5. Inuu xerta ka caawiyo xasuusashada waxkasta oo Ciise u sheegay iyaga si ay Qorniinka ugu diiwaan geliyaan (2:22; 15:26; 16:13)

Ciise laftiisa ayaa sidoo kale sarakicidda kadib Rasuullada tilmaamay, gaar ahaanna sida Axdiga Hore isaga wax uga sheegayo iyo sida uu u dhamays tiray (Luukos 24:13ff).

14:27 “Nabad baan idiinka tegayaa, nabaddaydana waan idin siinayaa,” nabadda rumaystayaashu lama xidhiidho dhacdooyinka, laakiinse waa mid ku salaysan Ciise ballan qaadkiisa iyo joogitaankiisa (16:33; Filiboy 4:7; Kolosay 3:15).

“nabad” waxa loo adeegsaday ujeedo iyo macne labadaba, dib ula heshiinta Ilaah iyo macne cidda ay kasoo fulayso ah, taasi oo keenaysa dareen xasillooni ah oo dhexdhexaadnaya xaaladaha adayga badan. Waxa ay ka

muuqataa salaanta Yuhuudda, *Shalom*, taasi oo macnaheeda loogala jeedo maqnaanshaha dhibaataada iyo joogitaanka xasiloona (20:19, 21; 3 Yooxanaa 14; Efesos 2:14; Tirintii 6:26; Sabuurka 29:11; Ishacyaah 9:6). Waxa aanay dabeecad u tahay casriga cusub!

MAWDUUC GAAR AH: MASIIXIGA IYO NABADDA

Eraygan macnihiisa Giriiggu asal ahaan wuxuu ahaa “dibu hagaajinta wixii xumaaday.” Haddaba waxa jira saddex siyaabood oo Axdiga Cusubi uga hadlyo nabadda:

1. Iyadoo tilmaamaysa nabadda aan Ilaah kula haysano Ciise Masiix aawadiis (Kolosay 1:20).
2. Inaga oo haysanna xaqnimada Ilaah (Yooxanaa 14:27; 16:33; Filiboy 4:7).
3. In Ilaah inagu mideeyay jidhka Masiixa Yuhuud iyo kuwo aan Yuhuud ahayn intaba (Efesos 2:14-17; Kolosay 3:15). Marka aan haddaba haysano nabadda Ilaah, waa in dadka kalena aan nabad la lahaano!

New Man iyo Nida, oo ahaa tarjumayaasha *Handbook on Paul's Letter* una tarjumay luqadda Roomaanka ayaa p.92, waxa uu “nabadda” kaga bixinayaa faallo wanaagsan:

“Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub labadaba, erayga nabad waxa uu leeyahay macnayaal kala geddisan. Aasaas ahaanna waxay tibaaxaysaa gebi ahaanba wanaagga uu qofku leeyahay; waxa xitaa dhaqan ahaan ay noqotay salaanta dadka Yuhuudda ah. waxa ay yeelan kartaa macno ay Yuhuuddu u adeegsadeen tilmaamista badbaadada Masiixa. Haddaba, xaqiiqadan aawadeed, waxa jirta marar loo adeegsaday ‘iyadoo xidhiidh saxa lala yeesho Ilaah.’ eraygani markaa halkan wuxuu uga muuqadaa in loo adeegsaday tilmaamista xidhiidhka aadanaha iyo Ilaah, taasi oo ku salaysan Ilaah oo shakhsi ahaantiisa xaqnimada u siiyay aadanaha” (p. 92).

▣ **“tegayaa”** Grant Osborne, kitaabkiisa *The Hermeneutical Spiral* (p.21) ayaa faallo fiican ka samaynaya mudnaan siinta macnaha marka erayga la macnaynayo.

▣ **“Macnaha Caqli Galka ah**

Macna kasta oo runa, waxa ugu muhiimsan macnaha caqli galka ah oo asaas u ah fasiraadda. Adaydaydayda waxaan u sheegaa haddii qof uu iska seexo oonu maqlin su’aasha aan waydiinayo, waxa jira boqolkiiba konton isbeddel saxsanaanta ah haddii uu ku jawaabo ama ay ku jawaabto ‘macnaha.’ Erayada laftooda ayaana ayaana saamayn ku leh qoraalka. Waxaana middan lagu tilmaami karaa fahan wax ku oola oo laga dheegan karo qoraalka laftiisa.

Markasta oon dhexda u dhowaanana, saamaynta macnuhu waa ay sii kordhaysaa. Noocu waxa uu soo saari karaa qoraalka noociisa ah waxaanu fasiraaga ka caawin karaa inuu garto kuw ay isku midka yihiin, laakiinse maaha mid saamayn ku yeelan karta qaybaha kale ee Qorniinka mawduuca ku saabsan. Tusaale ahaan, kitaabka Muujintii waxa abokalaybti laakiinse hadana inkastoo isku jiritaank axidiga iyo abokalaybtigu ay tusinayaan sinaanshiyo muhiim ah, haddana badnaa calaamadaha waxa lagasoo qaatay Axdiga Hore. Ugu dambayntana, macnaha xukunka ugu danbeeya ee khuseeya go’aammada oo dhami waxa uu yahay ka lagu tirinayo macnaha erayga ama fikirka. Lama hubo in Bawlos uu erayo isku si ugu wada adeegsanayo 1 Filiboy iyo 2 Filiboy. Luqadu maaha mid sidaas u shaqaysa, maxaa yeelay eray waliba waxa uu ku tiirsan yahay sida uu qoraagu u adeegsanayo iyo arrinta markaas laga hadlayo. Tusaale wanaagsan waxa noqon kara adeegsiga erayga *aphiemi* ee Yooxanaa 14:27 “Nabad baan idiinka *tegayaa*” iyo 16:28, “waan ka tegayaa dunida.” Waxa adag in labadan isku si loo fahmo maxaa yeelay waa isku liddi. Midda koobaad Ciise ayaa xerta waxsiinaya, halka talaabdana uu isaga laftiisu uu ka qaadanayo wax ka fog iyaga. Xitaa ugu yaraan erayga waxaan u akhrinaa adeegsi guud ahaaneed (sida ku sugan 1 Yooxanaa 1:9) ee “cafis.” Mowduucyada kalena waxay inaga caawinayaan qeexitaanka adeegsigeeda khuseeya dhinaca Yuhuudda (siyaabaha kala duwan ee erayga loo macnaysan karo), laakiinse macnaha tooska ah ayaa soo dhowayn kara suurta galnimada macnaha loogala jeedo” (p. 21).

▣ **“Qalbigiinnu yuusan murugoon”** waa fal jooga oo amarna ah isla markaasna ay la socoto diidmo, macneheeduna waxa weeyi “joojiya fal horeba u socday,” oo ah soo noqoshada aayadda 1.

14:28 “Haddaad i jeclaateen” waa jumlad shuruudeed heerka labaad ah, sida aayadda 7 oo loogu yeedhay “xaqiiqo liddi ah.” waxa ay ahayd mid wanaagsan in Ciise Aabbaha u tago oo uu soo diro Ruuxa, laakiin wakhtigaas la joogay iyagu may rumaysanin.

▣ **“Aabbuhu waa iga weyn yahay”** hadalkani maaha mid diirradda Saaraya Wiilka oon la sinayn Aabbaha, laakiinse hadalku waxa uu ku saabsanyahay wada shaqaynta Saddexmidnimada ee la xidhiidha badbaadada Aadanaha (10:29-30). Wakhtigan uu ka hooseeyay Wiilku Aabbaha waxa uu ahaa mid kooban oo ahaa intii uu joogay dhulka, isaga oo markaasina fulinayay qorshaha Ilaaha Saddexmidnimada ah ee ahaa muujinta iyo badbaadada (17:4-5; Filiboy 2:6-11). Si kastaba ha ahaatee, waxa jira macne laga dhadhansanayo inuu Aabbuhu yahay ka wax soo diray asal ahaan (13:16; 1 Korintos 15:27-28; Efesos 1:3-14).

14:29 “Haatan waxaan idiinku sheegay intaanay dhicin” sababtu waxa ay ahayd in rumaysadkooda uu sii xoogaysto (13:19; 16:4).

14:30

NASB

“madaxda dunida”

NKJV, NRSV, TEV

“madaxa dunidani”

NJB

“amiirka dunidani”

Tani waxa ay sheegaysaa Shaydaan oo hadda xukunkiisu uu ka taliyo dunida (12:31; 16:11; 2 Korintos 4:4, “ilaaha dunidan”; Efesos 2:2, “amiirka awoodda hawada”). Ciise waxa uu arkay tegitaanka Yuudas oo ah imaatinka Shaydaanka (13:27). Eeg Mawduuca Gaark ah 12:31.

▣

NASB, NKJV,

“waxba iguma laha”

NRSV, TEV, NJB

“wax awooda iguma laha”

Macnuhu waxa weeyi shaydaanka oon haysanin marmarsiyo, awood maamul, ama gebi ahaanba wax uu ku samayn karo Ciise (Cibraaniyada 4:15).

1. James Moffatt wuxuu u tarjumay “ima maamuli karo”
2. William F. Beck “waxba iguma eedayn karo”
3. New English Bible “wax xuquuqa iguma laha”
4. Twentieth Century New Testament “waxba ma wadaagno”

14:31 “laakiin tani waa in dunidu ku garato” Shaydaanku waxa uu ku dhex jiraa doonista Ilaah ee ku waajahan badbaadada aadanaha isaga oo saamayn ku yeelanaya. Eeg A. B. Davidson, kitaabkiisa *The Theology of the Old Testament*, pp. 300-306.

▣ **“inaan sameeyo sida Aabbuhu igu amray”** doonista Aabbaha ayay ahayd inuu Ciise dhinto (Ishacyaah 53a, b; Markos 10:45; 2 Korintos 5:21). Eeg Mawduuca Gaarka ah: 12:50.

▣ **“Kaca, aynu meeshan ka tagnee”** waa fal taagan oo amarna ah. Waa erayo macnayntoodu adagtahay maxaa yeelay waxa ay uga muuqanaysaa Matayos iyo Markos beertii Getsamane dhexdeeda, iyadoo Yuudas iyo askartii hubaysnaydna soo gaadhi rabeen Ciise. Sababta loogu dhex adeegsaday qolkii ay joogeen macnaha (cutubyada 13-17) waa midaan la hubin. Waxaana suurto gal ah in Ciise uu ka tegay meeshii ay joogeen oo waxbaristana samaynayay intii ay usii socdeen Getsamane (18:1).

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sharraxaad ka bixi farqiga u dhexeeya Theism, Deism iyo Masiixiyadda sida ka muuqata aayadda 1.
2. Sharrax saddexda magac ee ka muuqda aayadda 6 asalka ay ku leeyihiin Axdiga Hore.
3. Qof ma samayn karaa fiqi ku waajahan tukashada aayadda 13?
4. Waa maxay ujeedada ugu muhiimsan ee Ruuxa Quduusku? (kuwa lumay iyo kuwa badbaaday labadaba)
5. Shaydaanku ma doonista Ilaah ayuu ku dhex jiraa?

YOOXANAA 15

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ciise waa geedka canabka ah ee runta ah	Geedka canabka ah ee runta ah	Tusalaalaha nolosha Masiixiga	Ciise waa geedka canabka ah ee runta ah	Geedka canabka ah ee runta ah
15:1-10	15:1-8	15:1-11	15:1-4	15:1-17
	Jacayl iyo farxad buuxda		15:5-10	
	15:9-17			
15:11-57			15:11-17	
Nacaybka dunida	Nacaybka dunida	15:12-17	Nacaybka dunida	Xerta iyo dunida
15:18-16:4a				15:18-16:4a
15:18-25	15:18-25	15:18-25	15:18-25	
	Imaatinka diidmada			
15:26-16:4a	15:26-16:4	15:26-27	15:26-16:4a	

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad

4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE YOOXANAA 15:1-27

- A. Kuwani waa aayado cajiib leh, waxaanay rumaystayaasha siinaysaa dhiirri gelin wayn oo ah jacaylka Ilaah iyo ballan qaadka saamaynta leh, laakiinse sidoo kale waxa la socda digniin! Fuqahadu ka hadalka arrintan aadbay uga doodaan, markaa bal aan soo qaato mid ka mida mufasiriinta aan ugu jeclahay oo ah, F. F. Bruce kitaabkiisa *Answers to Questions*.
- “Yooxanaa 15:4, 6. maxaa loogala jeedaa hadalka ah ‘haddaydnaan igu jirin.’ Iyo ‘Qof uun hadduusan igu jirin’ ee ku sugan Yooxanaa 15:4, 6? Ma waxa suurta gala inaan lugu jiri karin Masiixa?
 - Aayadaha sidan oo kale ahi iyagu ma adka; laakiinse adkaanshuhu waxa uu ka imanayaa marka aan isku dayno inaan iyaga iyo Qorniino kale isku xidhno, halkii keligood ay fiqi ahaan ay aasaaska uga ahaan lahaayeen. Wakhtigii hore ee Sayidkeennu uu hadlayay waxa uu tusaale ahaan u soo qaadanayey kii ku dhacay inuu isaga ku dhex jiro, oo ahaa Yuudas Iskariyod, oo iyaga ka tegay. Yuudas waxa loo doortay sidii koob iyo tobanka kale si lamida (Luukos 6:13; Yooxanaa 6:70); la joogitaankoodii ay la joogeen Sayidkuna waxa uu iyaga u ahaa mid sinaann ah. aayadaha caddaanka ah ee Qorniinka ka midka ah isla markaana ka hadlayay dadaalkii ugu danbeeyay ee awliyada waa inaanay noqonin kuwo si qaldan loo adeegsado iyada oo cudur daar laga dhiganayo aayadaha ka hadlayay khatarta arrintan” (pp. 71-72).
- B. Waxa la yaab leh iyada oo qoraalkan aad loogu adeegsaday fal tegay, halka laga filayay fiqi ahaan in laga adeegsado fal jooga. Haddaba waxa laga yaabaa in falka tegay uu toosinayo qofka noloshiisa guud ahaan.
- C. Qaybinta cutubka 15 waa mid aan la hubin, waxaana laga yaabaa s ida waraaqda 1 Yooxanaa ka muuqata, inuu ina toosinayo midabyo kala duwan oo isku guda jira.
- D. Adeegsiga erayga “dhexjir” (*menō*) waxa Axdiga Cusub lagu dhex adeegsaday 112 jeer, waxaana ka mida Yooxanaa oo lagu dhex adeegsaday 40 jeer, iyo 26 jeer oo ah waraaqihiisa lagu adeegsaday. Kelmaddani haddaba Yooxanaa waxay u xanbaarsantahay macne fiqi ahaaneed. Inkastoo cutubka 15 si gaara loogu adeegsaday iyada oo tusinaysa ku dhex jirista Masiixa, waxa haddana loo adeegsaday macnayaal kale.
- Sharcigu weligiis wuu sugnaanayaa (Matayos 5:17-18) Masiixuna waa sidoo kale (12:34)
 - Cibraaniyada ayaa waxay sheegaysaa dariiq cusub oo wargelin ah, taasina maaha Wiil adeege ah, laakiin waa Wiil sugan (Cibraaniyada 1:1-3, iyo sidoo kale Yooxanaa 8:35)
 - Ciise wuxuu bixinayaa cunto waaraysa (6:27) iyo midho sugan (15:16). Labadan waxyaalood haddaba waxay tusinayaan baahida aan markasta joogta een u qabno Ciise waana: (1) ugu horrayn iyo (2) si joogto ah (6:53; 15:3)
 - Yooxanaa Baabtiisuhu wuxuu arkay Ruuxa oo soo degaya kuna sugnaanaya Ciise markii la baabtiisayay (1:32)
- E. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 2:10.
- F. Aayadaha 11-16 waxay sheegaysaa xerta oo loo ballan qaaday farxadda Ciise, halka aayadaha 17-27 ay ka sheegayaan silica taagnaanaya, sidoo kalena silica iyo cadaadisku wuxuu soconaysaa ilaa 16:4a. Si kastaba ha ahaatee, xertu waa inay isu jeclaadaan sida Ciiseba iyaga u jeclaaday!

NASB (UPDATED) TEXT: 15:1-11

¹Anigu waxaan ahay geedka canabka ah oo runta ah; Aabbahayna waa beerfalaha. ² laan walba oo igu taal oo aan midho dhalin, wuu gooyaa, oo mid kasta oo midho dhasha ayuu nadiifiyaa si ay midho ka sii badan u dhasho. ³Durba waad nadiifsan tihii hadalkaan idinkula hadlay daraaddiis. ⁴Igu jira, anna aan idinku jiree. Sida laantu keligeed aanay midho u dhali karin haddaanay geedka canabka ah ku oollin, sidaas oo kale idinkuna ma dhali kartaan haddaynaan igu jirin. ⁵Anaa ah geedka canabka ah, idinna waxaad tihiiin laamihii. Kii igu jira oo anna aan ku jiro, kaasaa midho badan dhala, maxaa yeelay, la'aantay waxba ma samayn kartaan. ⁶Qof uun hadduusan igu jirin waxaa loo tuuraa sida laan oo kale, waana qallalaa, markaasaa la ururiyaa, oo dabka lagu tuuraa, oo la gubaa. ⁷Haddaad igu jirtaan. oo ay erayadayduna idinku jiraan, weydiista waxaad doonaysaanba, waana laydiin yeeli doonaa. ⁸Waxaa Aabbahay ku ammaanmaa inaad midho badan dhashaan, waxaadna noqon doontaan xertayda. ⁹Siduu Aabbuhu ii jeclaaday, ayaan anna idiin jeclaaday. Jacaylkayga ku sii jira. ¹⁰Haddaad qaynuunnadayda xajisaan, jacaylkaygaad ku jiri doontaan, sidaan qaynuunnada Aabbahay u xajiyey, oo aan jacaylkiisa ugu jiro. ¹¹Waxaan waxyaalahaas idiinkula hadlay in farxaddaydu idinku jirto, iyo inay farxaddiinu buuxsanto.

15: 1 “Anigu waxaan ahay geedka canabka ah oo runta ah;” tani waxa ay ka mid tahay hadallada Ciise ee ku bilaabmay “Anigu” (4:26; 6:35; 8:12; 10:7, 9, 11, 14; 11:25; 14:6). Eraygani waxa uu Axdiga Hore dhexdiisa calaamad ugu ahaa Israa’iil (Sabuurka 80:8-16; Ishacyaah 5:1-7; Yeremyaah 2:21; Yexesqeel 15; 19:10; Hoosheeca 10:1; Matayos 21:33ff; Matkos 12:1-12, Rooma 11:17ff). Haddaba tusaalayaashan oo dahmi waxa ay sheegayaan in Ciise uu yahay Israa’iilka saxda ah (Ishacyaah 53). Sidii Bawlos uu kaniisadda ugu shabahay jidhka, caruuska Masiixa, iyo dhismaha Ilaah ayaa Yooxanaa isna ugu adeegsanayaa geedka canabka ah. Waxa uu tusinayaa in kaniisaddu ay tahay Israa’iilka xaqiiqiga ah waxaanay sidaas ku noqotay xidhiidhka ay la leedahay Ciise ee ah geedka canabka ah ee runta ah (Galatiya 6:16; 1 Butros 2:5, 9; Muujintii 1:6). Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55. Sidoo kalena eeg fiirada 8:12.

Mufasiriinta qaarkood ayaa sheega in wada sheekaysigii qolka markay joogeeni uu ku dhammaanayo 14:31, “ina keena.” Haddii sidaas ay tahay cutubyada 15-17 waxa ay ahaayeen waxbaristii markii ay u socdeen Getsamane. Sidoo kalena waxa suurto gal ah geedka canabka ah ee tusaalaha loo soo qaatay inuu ahaa miduu Ciise arkay markay jidka kusii jireen habeenkaas.

☐ “Aabbahayna waa beerfalaha” markale ayaa Ciise waxa uu muujinayaa xidhiidhka aadka u dhow ee uu la lahaa Aabbaha iyo sida uu doonistiisa ugu hoggaansan yahay.

15:2 “laan walba oo igu taal oo aan midho dhalin, wuu gooyaa, ..., badan u dhasho.” Waxa la adeegsaday magaca falsameeyaha taagan oo labo jeer ah aayaddan dhexdeeda. Midho dhalistu waa caddaynta badbaadada (Matayos 7:16, 20; 13:18ff; 21:18-22; Luukos 6:43-45). Macnaha aayaduhuna waxay tusinayaan Ciise oo ka hadlayay (1) khiyaanadii Yuudas (aayadda 6; 13:10; 17:12) ama (2) xerta beenta ah (2:23-25; 8:30-47; 1 Yooxanaa 2:19; 2 Butros 2). Injiilka Yooxanaa dhexdiisana waxa jirta heerar rumaysadku kala leeyahay.

☐ “nadiifiyaa” macno ahaan waa “nadiifin” waxaana adeegsaday Philo (BDBd 386). Axdiga Cusub dhexdiisana halkan oo keliya ayaa laga helayaa, waxayna kamid tahay erayada labolabada isugu xidhan ee Yooxanaa adeegsaday (nadiifin iyo goyn aayadda 3; 13:10). Haddaba, silica iyo dhibaataadu ujeedo ayay u leedahay rumaystaha (aayadaha 17-22). Waxa ay laban laabaysaa midho dhalista, waxaanay meesha ka saaraysa beenta, iyadoo markaasna Ilaah isku hallayntiisa keenaysa (Matayos 13:20-23; Rooma 8:17; 1 Butros 4:12-16). Labo kitaab oo mawduucan u wanaagsan ayaa waxa ay kala yihiin (1) *Principles of Spiritual Growth* oo uu leeyahay Miles Stanford iyo (2) *The Christian’s Secret of a Happy life* oo uu leeyahay Hannah Whithall Smith.

Marka la eego cutubyada 13-17 waxa suurto gal ah in nadiifintan lala xidhiidhin karo cago dhaqista ku sugan cutubka 13. Iyaga horaa loogu cago dhaqay (badbaadiy), laakiin cagahooda ayaa u baahday dhaqitaan (cafiska daa’imiska ah). Adeegsiga falka wakhtiga taagan ee 1 Yooxanaa 1:9 ayaa arrintan adkaynaysa. Addeecitaanka iyo tawbad keenkuna waa labo waxyaalood oo sii socoshadoodu ay lagama maarmaan tahay si loogu dhex jiro Masiixa.

Xanuunka ama silica ee nolosha rumaystuhu waxay noqon kartaa dhinacyo kala duwan

1. U ekaanshaha Masiixa (Cibraaniyada 5:8)
2. Ciqaab xadaysan oo denbiga khusaysa
3. Inay ka qayb tahay nolosha dunida leexatay

Waxa adag in hadiyo goor la fahmo ujeedada Ilaah ka leeyahay, laakiin marwalba la midnimada Masiixu waa suurto gal.

15:3 “waad nadiifsan tihiiin” erayga “nadiif” asalkiisa luqada Giriiggu waa (*kathairō*) aayadda 2 ayaa isna eragay “nadiif” (*katharos*) sidan oo kale yahay. Macnaha guudna waxa uu tilmaamayaa caddaynta xernimada runta ah. Erayga “durba” waxa ay iyana sheegaysaa kalsoonida xertu ku haystaa Masiixa (iyaga oo ka duwna Yuudas Iskaariyod 13:10).

▣ **“hadalkaan idinkula hadlay daraaddiis.”** (17:17; Efesos 5:26; 1 Butros 1:23).

15:4

NASB, NKJV

“Igu jira, anna aan idinku jiree”

NRSV

“Igu jira sidaan anba idiinku jiro”

TEV

“igu dhex jira anna waan idinku dhex jiri doonaayee”

NJB

“iigu dhex sugnaada sidaan anba idinku dhex suganahay”

Waa fal amar ah kuna dhisan xaqiiqo (Yooxanaa 6:56; 1 Yooxanaa 2:6). Su’aasha naxwe ahaaneed waxa weeyi haddii erayga labaad uu yahay tilmaamis ama is barbardhig. Kuwo badan oo ka mida aayadaha kitaabka ayaa adkaynaya caqiidada ah ilaalinta qoduusiinta ama awliyada (aayadaha 4, 5, 6, 7, 9, 10, 14; Markos 13:13; 1 Korintos 15:2; Galatiya 6:9; Muujintii 2:7, 11, 17, 26; 3:5, 12, 21; 21:7, eeg Mawduuca Gaarka ah 8:31). Badbaadada runta ahi waa ka jawaab celinta koobaad iyo ku socoshada. Hadiyo goor waxa dhacda inaan iska indho tirno xaqiiqadan fiqi ahaaneed inaga oo raadina badbaado shakhsi ahaaneed. Yaqiinsanaanta kitaabiga ahina waxay koobsanaysaa

1. Ku taagnaanta rumaysadka
2. Nolol ku dhisan towbad keen daa’im ah
3. Addeecitaanka daa’imka ah (Yacquub iyo 1 Yooxanaa)
4. Midho dhalis (Matayos 13:23)

Eeg Mawduuca Gaarka ah: 1 Yooxanaa 2:10

▣ **“laantu keligeed aanay midho u dhali karin”** tani waxa ay tusinaysaa muhiimadda ay leedahay ilaalinta Ilaah. Wax ku saabsan “midho” ka eeg fiirada aayadda 5.

▣ **“ku oollin...igu jirin”** waa labo jumlad shuruudeed oo heerka saddexaad ah waxaanay tusinayaan suurta galnimada samaynta arrintaas. Wax qabadkeenna ruux ahaaneed wuxuu ku xidhan yahay xidhiidhka aan la samayno Ciise.

15:5 “Kii igu jira oo anna aan ku jiro, kaasaa midho badan dhala” fal sameeyaha waxa raacsan fal taagan oo tumayn samaynaya. Wada jirka daa’imiska ahi waxa weeyi meesha midhuhu ka imanayaan. Midhuhuna waxa ay tilmaamayaan rumaystayaasha fikirkooda iyo wax qabadkooda (Matayos 7:15-23; Galatiya 5:22-23; 1 Korintos 13). Ilaah rumaystayaasha waxa uu u diyaarinayaa adeeg haddii ay isaga ku dhex sugnaadaan (aayadda 16).

▣ **“maxaa yeelay, la’aantay waxba ma samayn kartaan”** waa diidmo laban laab ah tusinaysana xaqiiqada aayadda 5 iyo Filiboy 4:13.

15:6 “Qof uun hadduusan igu jirin waxaa loo tuuraa sida laan oo kale” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah. Xaabada waxa loo adeegsadaa gubitaan maxaa yeelay hore ayay u gabanaysaa (Yexesqeel 15). Waxa laga yaabaa in middani tilmaamayso Yuudas amaba Israa’iil guud ahaan, ama rumaysadka beenta ah (Matayos 13:41-42; iyo 1 Yooxanaa 2:19, eeg Mawduuca Gaarka ah 17:12).

Tani waxa ay tusaale u tahay sida nolosheenu ay tahay iyada oo noqonaysa mid la tuuro ama midho dhasha (doorana Ilaah ama Shaydaan). Midhohooda ayaad ku garan doontaan (Matayos 7; Galatiya 6:7).

▣ “**dabka**” eeg Mawduuca Gaarka ah.

MAWDUUC GAAR AH: DABKA

Dabku waxa uu leeyahay waxyaalo isugu jira xumaan iyo wanaag Kitaabka dhexdiisa

A. Wanaaga

1. Waxbuu diiriyaa (Ishacyaah 44:15; Yooxanaa 18:18)
2. Waxbuu iftiimiyaa (Ishacyaah 50:11; Matayos 25:1-13)
3. Waxbuu kariyaa (Baxniintii 12:8; Ishacyaah 44:15-16; Yooxanaa 21:9)
4. Waxbuu nadiifiyaa (Tirintii 31:22-23; Maahmaahyadii 17:3; Ishacyaah 1:25; 6:6-8; Yeremyaah 6:29; Malaakii 3:2-3)
5. Quduusnaan (Bilowgii 15:17; Baxniintii 3:2; 19:18; Yexesqeel 1:27; Cibraaniyada 12:29)
6. Hoggaaminta Ilaah (Baxniintii 13:21; Tirintii 14:14; 1 Boqorradii 18:24)
7. Awoodda Ilaah (Falimaha Rasuullada 2:3)
8. Ilaalin (Sekeryaah 2:5)

B. Xumaanta

1. Waxbuu gubaa (Yashuuca 6:24; 8:8; 11:11; Matayos 22:7)
2. Waxbuu burburiyaa (Bilowgii 19:24; Laawiyiintii 10:12)
3. Cadho (Tirintii 21:28; Ishacyaah 10:16; Sekeryaah 12:6)
4. Ciqaab (Bilowgii 38:24; Laawiyiintii 20:14; 21:9; Yashuuca 7:15)
5. Calaamad been ah (Muujintii 13:13)

C. Waxa lagu tilmaamaa cadhada Ilaah iyo naarta

1. Cadhadiisu way gubataa (Hoosheeca 8:5; Sefanyaah 3:8)
2. Daadashada cadhadiisa (Naaxuum 1:6)
3. Dabka abidka ah (Yeremyaah 15:14; 17:4)
4. Ciqaabka aakhiro (Matayos 3:10; 13:40; Yooxanaa 15:6; 2 Tesaloniika 1:7; 2 Butros 3:7-10; Muujintii 8:7; 16:8)

D. Sida erayo badan oo ka mida Kitaabka (khamiirka, libaaxa) ayaa dabku waxa uu noqon karaa barako ama habaar kolba sida loogala jeedo.

15:7 “Haddaad igu jirtaan. oo ay erayadayduna idinku jiraan” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah iyadoo faa’idaynaysa suurta galmimada arrintaas. Salaadda looma aqbalo si otomaatik ah loogama jawaabo! Ciise haddaba tusaalihii ku dhex jirnimada waxa uu uga gudbayaa ku dhex jirista eraygiisa ee xertiisa ku jira. Ciise iyo waxbaristiisuba waxay muujinayaa Aabbaha, sidaasi darteedna injiilku wuxuu isugu jiraa shakhsi iyo farriin wada socda.

▣ “**weydiista waxaad doonaysaanba, waana laydiin yeeli doonaa**” waa fal amar ah oo dhexdhexaad ah (aayadda 16). Ereyadan in badan ayaa si qaldan loo fahmay sidaasi darteedna ka taxadir inaad keligeed macnaysato adigoo ka tegaya Qorniinka kale (firada 14:13). Eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 3:22.

15:8 “Aabbahay ku ammaanmaa” waxay caddaynaysaa nololsha rumaystayaasha ku dayda Masiixu inay yihiin xer run ah oo Ilaahna ammaan ayay u keentaa. Yooxanaa 13:31-32; 14:13; 17:4; iyo Matayos 9:8; 15:31 Aabbuhu waxa uu ku ammaanmaa shaqada Wiilka iyo shaqada muuminiinta (Matayos 5:16). Eeg fiirada 1:14.

▣

NASB

NKJV

NRSV, TEV

NJB

REB

“waxaadna noqon doontaan xertayda”

“waxaad ahaan doontaan xertayda”

“noqonaysaan xertayada”

“ahaada xertayda”

“haddaba ahaada xertayda”

**NIV, Goodspeed NET Bible “waxaad muujinaysaan inaad xertayda tihiin”
JB “kaddib waxaad ahaan doontaan xertayda”**

Kala duwanaanshaha waxa sababay kala duwanaanta ficillada.

1. Fal tegay, MSS P⁶⁶, B, D, L
2. Mustaqbal tasmayn ah, MSS a, A

Nolosha rumaystayaashu waxay tusinaysaa cidda ay yihiin! Falka iyo wakhtiga dhicitaankiisu muhiim maaha inta inta noloshu ay noqonayso mid ku dhisan jacay, addeecitaan, iyo adeeg. Kuwanina waxa ay calaamad u yihiin Masiixiga runta ah! La inaguma badbaadinin jacaylkeenna, addeecitaankeenna, adeeggeena (Efesos 2:8, 9), laakiinse waxa ay tusinayaan oo keliya inaan rumaystayaal nahay (Efesos 2:10).

Erayga ah “xer” waxa lagu adeegsaday Injiilka Yooxanaa iyada oo la tilmaamayo rumaystayaasha raaca ee muujiya dabeecadda Ilaah. Yooxanaa uma adeegsanayo “kaniisad” (*ekklesiā*) xitaa marqudha, sidaasi darteedna “xer” wuxuu u adeegsanayaa is weheshiga Masiixinimo iyo isu imaatinka. Xernimadu waa casriga cusub ee beddelay casrigii hore, waxaana summad u ah jacayl, nuur, addeecitaan, iyo adeeg! Waana sida kuwa kale ku garan karaan xerta Ciise.

15:9 “Siduu Aabbuhu ii jeclaaday, ayaan anna idiin jeclaaday” xidhiidhyadan taxanaha ahi waxa ay ka mid yihiin xidhiidhyada u gaarka qoyska Ilaah, Waayo aabbuhu wuxuu jecelyahay Wiilka, halka Wiilkuna uu ka jecelyahay xertiisa iyadoo xertuna ay is jecelyihiin.

▣ **“Jacaylkayga ku sii jira”** waa amar ku dhisan aqoon. Rumaystayaasha waxa lagama maarmaan u ah inay ku dhex jiraan oo ku suganaadaan

1. Tukasho (aayadda 7; 14:14)
2. Addeecitaan (aayadaha 10, 20; 14:15, 21, 23, 24)
3. Farxad (aayadda 11)
4. Jacayl (aayadda 12; 14:21, 22, 24)

Kuwanina dhammaan waxa ay calaamad u yihiin xidhiidhka gaarka ah ee Ilaah lala leeyahay. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 2:10.

15:10 “Haddaad qaynuunnadayda xajisaan” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah tusinaysana suurta galnimida xaqiijinta. Addeecitaanku waa daliilka xerta runta ah (8:31; 14:15-21, 23-24; Luukos 6:46). Waxa aanay tusaale u tahay sida Ciise u addeecay doonista Aabbaha.

▣ **“jacayl”** erayga jacayl asal ahaan Giriiggu wuxuu ku yahay “*agapē*” waxaana weeyi eray aan luqadii hore ee Koinka Giriigga aan lagu adeegsanin. Waxa adeegsatay kaniisaddii hore iyada oo koobsanaysa macnayaal xadaysan. Waxa loo adeegsaday xaasidnimo la’aanta, naf isu hurista, dabacsanida, iyo jacaylka wax ku oolka ah. Haddaba, jacaylku waa waxqabad mana aha caadifad oo keliya (3:16). Dhinaca fiqi ahaaneed eraygani waxa uu la macno yahay *hesed* taasi oo Axdiga Hore dhexdiisa ku tusinaysa jacaylka Ilaah u qabo dadkiisa.

▣ **“sidaan qaynuunnada Aabbahay u xajiyey”** waa fal dhammays tiran oo tasmayn wata. Sida Masiixu ugu xidhan yahay Aabbaha oo kale, rumaystayaashuna waa inay ugu daydaan, maxaa yeelay midnimada ka dhexaysa Wiilka iyo Aabbuhu waa inay rumaystayaashana ka dhex muuqato (14:23).

15:11 “farxaddiinnu buuxsanto” rumaytayaashu waa inay haystaan farxadda Ciise (17:13). Farxaddanina waxay tahay caddayn kale oo tusinaysa xernimada runta ah (15:11 [labo jeer]; 16:20, 21, 22, 24; 17:13). Dunida waxa ka jira xanuun iyo dhibaato, Laakiin Masiixa waxa ku sugan farxad buuxda. NIDOTE, vol. 1, p. 741, ayaa faallo wanaagsan ka bixiniya “farxadda” iyo “buuxsanaanta” sida loogu dhex adeegsaday qoraallada Yooxanaa.

“Yooxanaa dhexdiisa iyo waraaqihiisaba waxa jira xidhiidh ka dhexeeya farxadda (*chara*) iyagoo isu ah fal sameeye iyo fal. *Plēroō* waxay ka dhigantahay labuuxiyo. Farxaddani waa farxadda Ciise (15:11; 17:13) taasi oo uu ugu keenayo imaanshaha (3:29), eraygiisa (15:11; 17:13), iyo soo laabashadiisa (16:22) xertiisa (15:11; 17:13). Waxa ay bedelaysaa murugada iyo dhibaata ku sugan qalbiyadooda (16:16, 20). Haddaba, farxadda Ciise waxay noqonaysaa farxaddooda (15:11; 16:24; 1 Yooxanaa 1:4). Farxaddani marka ay noqoto mid ka muuqata xerta oo Ciise la socdana waxay noqonaysaa mid buuxsanta (3:29; 15:11; 16:24; 17:13; 1 Yooxanaa 1:4; 2 Yooxanaa 12). Xaqiiqaduna waxay tahay Ilaah oo farxaddan dhammays tiraya.”

NASB (UPDATED) TEXT: 15:12-17

¹²Kanu waa qaynuunkayga inaad isjeclaataan sidaan idiin jeclaaday. ¹³Ninna ma leh jacayl kan ka weyn inuu nin naftiisa u bixiyo saaxiibbadiis. ¹⁴Saaxiibbaday baad tihii haddaad yeeshaan waxaan idinku amro. ¹⁵Mar dambe addoommo idiinku yeedhi maayo, maxaa yeelay, addoonku garan maayo wuxuu sayidkiisu sameeyo, laakiin saaxiibbo waan idiinku yeedhay, maxaa yeelay, waxaan Aabbahay ka soo maqlay oo dhan ayaan idin ogeysiiyey. ¹⁶Idinku ima aydnaan dooran, laakiinse anaa idin doortay, waanan idiin diray inaad tagtaan oo midho soo dhashaan, iyo in midhihiinnu sii jiraan, in wax alla waxaad Aabbaha magacayga ku weydiisataan uu idin siiyo. ¹⁷Waxyaalahaas ayaan idiinku amray inaad isjeclaataan.

15:12 “Kanu waa qaynuunkayga” Ciise arrintan marar badan ayuu kusoo celcelinayaa (13:14; 15:17; 1 Yooxanaa 3:11, 23; 4:7-8, 11-12, 19-21; 2 Yooxanaa 2:5).

▣ **“inaad isjeclaataan”** waa fal taagan wakhti xaadirka oo tusinaya dardaaran waaraya. Jacaylku waa midhaha Ruuxa (Galatiya 5:22). Mana aha dareen ama caadifad oo keliya balse waa camal (Galatiya 5:22-23; 1 Korintos 13).

▣ **“sidaan idiin jeclaaday”** waa fal tegay oo tusmayn sida. Waxa laga yaabaa inay tahay iyadoo si dadban looga hadlo isku tallaabta (aayadda 13). Markale ayaa Ciise wuxuu adkaynayaa in jacalkiisa naf bixinta ahi uu ka muuqdo nolosha rumaystayaasha (2 Korintos 5:14-15; Galatiya 2:20; 1 Yooxanaa 3:16).

15:13 “nin naftiisa u bixiyo saaxiibbadiis.” Waxa ay tilmaamaysaa Ciise oo naftiisa kafaaro gud ahaan u bixiyay (10:11, 15, 17, 18; Markos 10:45; Rooma 5:7-8; 2 Korintos 5:21; Ishacyaah 53). Kanina waa jacaylka camalka ah, ee laga rabo xertu inay ku dhaqmaan (1 Yooxanaa 3:16).

15:14 “Saaxiibbaday baad tihii” eraygan asal ahaantiisa Giriiggu waa *philos* iyadoo markastana la xidhiidha saaxiibtimada uu la socdo jacaylku (*phileō*). Luqada Giriigga ee Koinka wakhtigii Yooxanaa waxa loo adeegsaday labada eray ee *“agapaō”* iyo *“phileō”* waxayna ahaayeen kuwo siman (barbar dhig 11:3[*phileō*] iyo 5 [*agapaō*]); sidoo kale *phileō* waxa loogu adeegsaday jacaylka Ilaah 5:20.

▣ **“haddaad yeeshaan waxaan idinku amro.”** Waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah iyadoo faa’idaynasa suurta galnimada xaqiijinta arrintaas. Addecitaanku wuxuu shardi u yahay runta (14:15, 23-24; 15:10; Luukos 6:46). Sidii Ciiseba ugu sugnaaday Aabbaha iyo jacaylkiisa, rumaystayaashuna waa inay ugu daydaan oo u addeecaan.

15:15 Ciise xert waxa uu ku war geliyay (1) runta ku saabsan Ilaah iyo (2) waxyaalaha mustaqbalka dhici doona. Waxa uu muujiyay awooddiisa isaga oo raba inuu iyaga rumaysadkooda dhiirri geliyo. Wixii markaa Ciise xertiisa la wadaagay iyaguna waa inay la wadaagaan kuwa kale (Matayos 28:20).

15:16 “Idinku ima aydnaan dooran, laakiinse anaa idin doortay” waxa jira dhowr arrimood oo xagga naxwaha ah kuna sugan aayaddan

1. Fal tegay oo tusmayn ah – waxa uu tusinayaa in Ciise laftiisu uu hal mar doontay ilaa weligood (6:70; 13:18; 15:16.19)
2. Erayga xooggan ee *“alla”* oo loo tarjuma *“Laakiin”*
3. Adeegsiga magac u yaalka *“ego”* ama *“Aniga”*

Waxay tani tahay ka jawaab celinta aadanaha iyo doorashada. Labadubana waxa weeyi kitaabi. Ilaah hadiyo goorba isaga wax bilaaba (6:44, 65; 15:16, 19), Laakiin aadanuhu waa inay ka jawaabaan (1:12; 3:16; 15:4, 7, 9). Ilaah marwalba dadka waxa uu kula heshiyyaa xidhiidh axdiga ah. Eeg Mawduuca gaarka ah 3:16.

Falka ah *“doortay”* macnaha halkan waxa uu ku tilmaamayaa labo iyo tobankii xerta ahaa. Waxa ay markaas la xidhiidhaa *“iyadoo loo doortay adeeg”* Axdiga Hore dhexdiisa, Laakiin Axdiga Cusub waxay sheegaysaa *“loo doortay badbaado.”* Rumaystayaasha Axdiga Cusub waxa loo doortay la midnimada Masiixa ee xagga adeegga,

xaasidnimo la'aanta, naf u hirista Boqortooyada Ilaah. Waxaana muuqata in dhammaanba wixii la xidhiidhay danaysiga iyo leexashada la jebiyay.

Yooxanaa waxa dabecad u ah wixii Ciise kula hadlayay xerta inuu sidoo kale ka dhigayo mid khusaysa rumaystayaasha oo dhan. Iyagu waxay u taagnaayeen midhihi ugu horreeyay ee xernimada, Laakiin xidhiidhkoodu waa

1. Inay u gaar tahay iyagoo ahaa markhaatiyaal goob joog ah
2. Waxay ku filaysaa dhammaanba rumaystayaasha Ciise u rabo inay rumaystaan oo raacaan.

▣ **“waanan idiin diray inaad tagtaan oo midho soo dhashaan, iyo in midhihiinnu sii jiraan”** waa falal jooga oo tusmayn wada (1) taga; (2) midho dhala; iyo (3)midhihiinu sii joogaan. Rumaystayaashu waa ay diran yihiin (Matayos 28:19-20; Luukos 24:46-47; Falimaha Rasuullada 1:8). Fiqi ahaan erayga “diray” waxa laga arki karaa Falimaha Rasuullada 20:28; 2 Timoteyos 1:11. Sidoo kalena waxa loo adeegsaday dhimashada Ciise u dhintay beddelka rumaystayaasha (10:11, 15, 17-18; 15:13).

▣ **“magacayga”** rumaystayaasha noloshoodu waa inay muujiso Ciise. Eraygani waxa uu la mid yahay “doonista Ilaah” marka aan eegno 1 Yooxanaa 5:14. Jacaylka iyo salaadda la aqbalaana way isku xidhan yihiin sida ku sugan 14:13-15. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 14:14.

15:17 “Waxyaalahaas ayaan idiinku amray inaad isjeclaataan” eeg fiirada aayadda 12. Ducada la aqbalaa waxay ku xidhan tahay jacaylka iyo adeegga!

NASB (UPDATED) TEXT: 15:18-25

¹⁸Dunidu hadday idin nebcaato. waad garanaysaan inay hortii i nebcaatay. ¹⁹Haddaad kuwa dunida ahaan lahaydeen, dunidu kuweeda way jeclaan lahayd, laakiin kuwa dunida ma ihidin, waanse idinka doortay dunida, taas aawadeed dunidu way idin neceb tahay. ²⁰Xusuusta hadalkaan idinku idhi, Addoon kama weyna sayidkiisa. Hadday i silciyeen, idinkana way idin silcin doonaan. Hadday hadalkayga xajiyeen, kiinnana way xajin doonaan. ²¹laakiin waxyaalahaas oo dhan waxay idiinku samayn doonaan magacayga aawadii, maxaa yeelay, waxaanay garanayn kii i soo diray. ²²Haddaan iman oo aanan la hadlin, dembi ma ay lahaadeen, laakiin hadda dembigooda marmarsiinyo uma haystaan. ²³Kii i neceb. waxaa kaluu neceb yahay Aabbahay. ²⁴Haddaan dhexdooda ku samayn shuqullada aan nin kale samayn, dembi ma ay lahaadeen, haddase aniga iyo Aabbahayba way na arkeen oo na nebcaadeen. ²⁵laakiin sidaas waxay u noqotay inuu dhammaado hadalka sharcigooda ku qorani, Way ii nebcaadeen sabab la'aan.

15:18 “haddii” waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah sax ka ah dhinaca qoraaga. Dunidan leexatay waxa ay nacayaan oo diidaan cidda raacda Ciise.

▣ **“dunidu”** Yooxanaa eraygan dhowr siyaalood ayuu u adeegsananaa (1) dhulka, isagoo tusaale u ah aadanaha (3:16) iyo (2) dadka oo si Ilaah ka gaara u shaqaynaya (10:8; 1 Yooxanaa 2:15-17). Eeg Mawduuca Gaarka ah 14:17.

▣ **“nebcaato”** waa fal taagan oo tusmayn wada macnihiisuna waa dunida oo idiin cadhoon doonta (aayadda 20)

▣ **“garanaysaan”** amar xaadir ah oo aqoon ku dhisan. Aqoonta rumaystayaashu u leeyihiin runta ku jirta Axdiga Cusubi waxay ka caawinaysaa sidii ay ku waajihi lahaayeen nacaybka dunidu u qabto.

▣ **“inay hortii i nebcaatay.”** Waa fal dhammays tiran oo tusmayn wada. Aayaddani waxay muujinaysaa sida dunidu u necebtahay Masiixa iyo dadka Ilaah (17:14; 1 Yooxanaa 3:13). Rumaystayaashu waxay mid ku yihiin jacaylka Masiixa iyo necbaanshaha la necebyahay (Rooma 8:17; 2 Korintos 1:5, 7; Filiboy 3:10; 1 Butros 4:13). La midowga Masiixu waxa ay keenaysa farxadda iyo necbaanshaha iyo xitaa in aawadiis loo dhinto.

15:19 “haddii” waa jumlad shuruudeed heerka labaad ah looguna yeedho “lid ku ah runta.” Haddii aad dunida ka ahaan lahaydeen kama tihidinee, dunidu way idin jeclaan lahayd Laakiin idinma jecla.

15:20 “Xusuusta” waa fal amar ah oo aqoon ku dhisan sida aayaddah 18 ama waa fal jooga oo wax tusmaynaya, waxa suurto gal inuu yahay su’aal (LB).

▣ **“Addoon kama weyna sayidkiisa”** marka aayaddan la barbar dhigo 13:16, waxa muuqanaysa inuu Ciise hadal maahmaah ah siyaabo kala duwan u adeegsaday.

▣ **“Hadday i silciyeen...way xajin doonaan”** waa labo weedhood oo shuruud xanbaarsan heerka koobaadna ah. Erayga “silciyaan” waxay tusinaysaa iyadoo xayawaan ugaadhsade ahi uu wax erylano. Haddaba, silicu wuxuu shay caadi ah u yahay kuwa Ciise raaca (Matayos 5:10-12; Yooxanaa 16:1-3; 17:14; Falimaha Rasuullada 14:22; Rooma 5:3-4; 8:17; 2 Korintos 4:16-18; 6:3-10; 11:23-30; Filiboy 1:19; 1 Tesaloniika 3:3; 2 Timoteyos 3:12; Yacquub 1:2-4; Butros 4:12-16).

Si kastaba ha ahaatee u firso iyada oo qaar ay diideen rasuullada oo xitaa ay silciyeen, dhinaca kale kuwo kale ayaa ka raacay! Iyaga laftooda ayaana xaqiiqadan muujinaya!

15:21 “waxaanay garanayn kii i soo diray” waxa cad in tani ay tilmaamayso Aabbaha iyo in Yuhuudda iyo umadaha oo dhamina aanay garanayn Ilaah. Erayga “garasho” adeegsigiisa Axdiga Hore wuxuu tusinayaa xidhiidh shakhsi ahaaneed (Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5). Dunida luntay waxay silcinayaan rumaystayaasha maxaa yeelay (1) iyaga waxa leh Ciise oo isagaba hore ay u silciyeen iyo (2) ma garanayaan Ilaah!

15:22 “Haddaan iman” waa jumlad shuruudeed heerka labaad ah oo lagu magacaabo “inay liddi ku tahay runta.” Waxa ay noqonaysaa “haddii aanan iman lahayn, Laakiin waan imi oo waan la hadlayee, may lahaadeen eed, Laakiin hadda way leeyihiin.” Masuuliyaddu waxay la xidhiidhaa aqoonta (eeg Mawduuca Gaarka ah 5:21). Macnaha halkana laamaha aan midhaha dhalini (Yuudas iyo Yuhuudda) waxay haystaan jaanis badan oo ay aqoonta ku heli karaan, isagoo weliba jaaniskoodu ka badan kuwa waxyiga dabiiciga ah helay (Sabuurka 19:1-6; Rooma 1:18-20 ama 2:14-15).

15:23 mucaaradka lagaga hor yimaaddo Masiixu waxa ay ka dhigantahay iyada oo Ilaah la mucaaraday (aayadda 24; 1 Yooxanaa 5:1).

15:24 “haddaan” waa jumlad shuruudeed heerka labaadha “xaqiiqada liddi ku ah.” Waxay ka dhigan tahay “haddii aanan dhexdooda shuqullo ku samayn lahayn anoo ku sameeyay, eed may lahaadeen Laakiin hadda way leeyihiin.” Nuurku waxa uu keena masuuliyadda (1:5; 8:12; 12:35, 46; 1 Yooxanaa 1:5; 2:8, 9, 11; Matayos 6:23).

▣ **“aniga iyo Aabbahayba way na arkeen oo na nebcaadeen”** waa labo fal oo dhammays tiran tusmayna xanbaarsan. Diidmada Ciise waxa ay ka dhigan tahay iyadoo Ilaah la diiday (1 Yooxanaa 5:9-13).

15:25 waxa la yaab leh iyada oo erayga “Sharci” ama “Tawreed” loo adeegsaday xigasho ah Sabuurka 35:19; 69:4. Hadiyo goorna eraygan waxa loo adeegsaday qoraalladii Muuse ee Bilowgii ilaa Sharciga Kunoqoshadiisa. Ujeedada ka danbaysa inay Yuhuuddu diidaan Ciise iyagoo ogsoon waxa weey rumaysad la’aan kas ah (Ishacyaah 6:9-13; Yeremyaah 5:21; Rooma 3:9-18).

NASB (UPDATED) TEXT: 15:26-27

²⁶laakiin markuu yimaado Gargaaraha oo aan xagga Aabbaha ka soo diri doono, isagoo ah Ruuxa runta oo xagga Aabbaha ka soo baxa, ayuu ii marag furi doonaa. ²⁷Idinkuna waad marag furi doontaan, waayo, tan iyo bilowgii waad ila jirteen.

15:26 “markuu yimaado Gargaaraha oo aan xagga Aabbaha ka soo diri doono” Aabbaha iyo Wiilka ayaa soo diraya Ruuxa (14:15, 26; 15:26; 16:7). Shaqada badbaadaduna waxay koobsanaysaa saddexda shakhsi ee Saddexmidnimada.

▣ **“Ruuxa runta”** macneheedu waxa weeyi iyada oo Ruuxa Quduuska ahi muujinayo Aabbaha (14:17, 26; 15:26; 16:13). Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55 iyo 17:3.

▣ “ii marag furi doonaa” muhiimadda Ruuxa Quduuska hi waa isaga oo muujinaya Ciise iyo shuqulladiisa (14:26; 16:13-15; 1 Yooxanaa 5:7).

15:27 “Idinkuna waad marag furi doontaan” waa fal taagan oo ogaansho ku dhisan tusmayna xanbaarsan. Aayaddani waxay muujinaysaa waxygii qorayaasha Axdiga Cusub oo ahaa kuwo la socday intii Ciise shaqadiisa dhulka uu ku guda jiray (Luukos 24:48). Eeg Mawduucyada Gaarka ah: 1:8 iyo 14:26.

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu koobsanayaa ku dhex jirku?
2. Maxaa dhacaya haddii rumaystuhu joojiyo ku dhexjirista? Sidoo kale maxaa dhacaya marka uu rumaystuhu midho dhal samayn Waayo?
3. Maxaa caddayn u ah xerta runta ah?
4. Haddii silicu shay caadiya u ayahay Masiixiyiinta, maxay taasi wakhtigan aan joogno inoola macno tahay?
5. Aayadda 16 kabixi sharraxaad adiga kuu gaar ah.

YOOXANAA 16

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Nacaybka dunida (15:18-16:4a)	Imaatinka la diiday (15:26-16:4)	Xidhiidhka Masiixiyiintu dunida la leeyihiin 16:1-4a 16:4b-11	(15:18-16:4a)	Xerta iyo dunida (15:18-16:4a)
Shaqada Ruuxa 16:4b-11	Shaqada Ruuxa Quduuska ah 16:5-15	16:12-15	Shaqada Ruuxa Quduuska ah 16:4b-11	Imaatinka gargaaraha 16:4b-15
16:12-15 Murugadu farxad bay isu rogi doontaa 16:16-24	Murugadu farxad bay isu rogi doontaa 16:16-24	16:16-24	16:12-15 Murugada iyo farxadda 16:16 16:17-18 16:19-22 16:23-24	Ciise oo hore usoo laaban doona 16:16 16:17-28
Waan ka guulaysan doonaa 16:25-33	Ciise wuu ka guuleystay dunida 16:25-33	16:25-28 16:29-33	Ka guulaysashada dunida 16:25-28 16:29-30 16:31-33	16:29-33

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE YOOXANAA 16:1-33

- A. Macnaha isku xidhani waxa uu ka bilaabmayaa 15:18-16:4a. Qaybinta cutubyada maaha waxyi Laakiin waa wax markii danbe la adeegsaday waana iyada oo hadalka loo qaybiyo sadarro ama aayado ama cinwaano.
- B. Aayadaha 8-11 waxay ka hadlayaan muhiimadda Ruuxa Quduuska ahi u leeyahay kuwa lumay, iyadoo shaqadiisuna tahay inuu badbaadiyo sida ku sugan 12-15. Samuel J. Mikolaski ayaa shaqada Ruuxa wuxuu kaga hadlayaa maqaalka ah “The Theology of the New Testament” kitaabka The Exposition Bible Commentary, vol. 1:
“Iyadoo xidhiidh ka dhexeeyo caqiidada quduusnaanta iyo xaq ka dhigista ee Axdiga Cusub dhexdiisa haddana wax jira waxyaabo ay ku kala soocan yihiin. Quduusnaantu Axdiga Hore dhexdiisa waxay muhiimadda saaraysa soocnaan – Quduusaanta Ilaah – iyo nooca akhlaaqda ah ee dadka laga rabo markay Ilaah xidhiidhka la leeyihiin. Qudaas ka dhigistu waxa weeyi shaqada Ruuxa Quduuska ah oo rumaystayaasha ku mideeya Masiixa, isaga oo noloshooda ruux ahaaneed cusboonaysiiya. Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa ku baabtiiska Ruuxa (1 Korintos 12:13), calaamadda Ruuxa (Efesos 1:13, 14; 4:30), ku dhex jirista Ruuxa (Yooxanaa 14:17; Rooma 5:4; 8:9-11; 1 Korintos 3:16; 6:19; 2 Timoteyos 1:14), jihaynta Ruuxa (Yooxanaa 14:26; 16:12-15), ka buuxitaanka Ruuxa (Efesos 5:18), midhaha Ruuxa (Galatiya 5:22, 23). Quduus ka dhigistu waxay ku xidhantahay xaq ka dhigista aan ku hortaaganahay Ilaah (Cibraaniyada 10:10), waxaana suurto gal ah inuu yahay tusaale horumar ku jira.” (p. 474).
- C. Aayadda 17 waxay koobsanaysaa su’aal ka sugnaatay Rasuullada sida 13:36; 14:5, 8, iyo 22.
- D. Kuwo badan ayaa rumaysan in 14:31 iyo 18:1 ay tusinayaan Ciise oo ku hadlay waxyaalaha ku qoran cutubyada 15-17 markii ay ku socdeen Getsamane.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 16:1-4

¹Waxaan waxyaalahaas idiinkula hadlay inaydnaan ka xumaanin. ²Waxay idinka saari doonaan sunagogyada, weliba saacadda imanaysa in mid walboo idin dilaa uu u malaynayo inuu Ilaah u adeegayo. ³Oo waxay waxyaalahaas u samayn doonaan, waayo, waxaanay garanayn Aabbaha iyo aniga toona. ⁴laakiin waxaan waxyaalahaas idiinkula hadlay in markii saacaddoodu timaado aad xusuusataan inaan idiin sheegay. Tan iyo bilowgii waxyaalahaas idinkulama hadlin. maxaa yeelay, waan idinla joogay.

16:1

NASB “inaydnaan ka xumaanin”

NKJV “inaydaan noqonin kuwo ka xumaada”

NRSV “inay idinka ilaaliso ka xumaanshaha”

TEV “si aydaan rumaysadkiina uga joogsanin”

NJB “si aydaan u leexanin”

Waa fal tegay oo ku dhisan waxaan lagaranayn. Erayga Giriigga ah (*skandalizō*, BAGD 752) waxa asal ahaan loo adeegsaday dabinka xayawaanka lagu qabto, halkana waxa loogu tarjumay “ka fogaansho” (Matayos 13:21; 24:10; Markos 4:17; 14:27, 29). Halkan waxa loogu adeegsaday in rumaystayaashu ay noqon waayaan kuwo aan ogsoonayn waxa sugaya ee ah silcin kaga imanaysa Yuhuudda kale amaba hoggaamiyayaasha diimaha.

16:2 “Waxay idinka saari doonaan sunagogyada” waxay tilmaamaysaa iyadoo laga eryi doono diinta Yuhuudda (9:22, 34; 12:42). Waxba ka garan mayno sida la isu eryi jiray wakhtigaas, Laakiin waxaan garanaynaa wakhti kooban oo cibaadada la isugu yimaaddo kusoo daris la’aanteed. Wakhti danbe oo ahaa qarnigii koobaad kaddib 70 C.D. markii Yerusaalem baaba’day ayaa rabbiyiintu waxay sameeyeen wax loo yaqaano “qaybta habaarka.” Arrintani waxay la xidhiidhay Masiixiyiinta oo lagu khasbay inay ka fogaadaan sinagoogyada, arrintana waxa ka dhalatay dhibaato ka dhex aloosantahay kuwii Masiixa raacsnaa iyo Yuhuuddii sinagoogyada ku cibaadaysan jirtay.

▣ **“mid walboo idin dilaa uu u malaynayo inuu Ilaah u adeegayo.”** Tani waxay ahayd middii hogaamiyayaasha Yuhuuddu (Ishacyaah 66:5; Matayos 5:10-12; 10:32) ku fikirayeen. Waxa middan tusaale u ah Bawlos oo hore uga mid ahaa kuwii sidaan aaminsanaa (Falimaha Rasuullada 26:9-11; Galatiya 1:13-14).

16:3 “waxyaalahaas u samayn doonaan” inuu qofku Ilaah u go’o oo rumaysadkiisa ku dheganaado oo keliya maaha, maxaa yeelay dhinaca kale waxa ka jira shar badanaa magaca Ilaah dartiis lagu sameeyo oo loogu marmarsoodo.

▣ **“waxaanay garanayn Aabbaha iyo aniga toona”** erayga ah “garanayn” Axdiga Hore dhexdiisa waxa uu tilmaamayaa garasho iyo xidhiidh shakhsi ahaaneed (Bilowgii 4:1; Yereyaaah 1:5). Waxa weeyi erayo adag oo tusinaya in diidmada Ciise ay tahay diidmada Ilaah (8:19; 15:21; 1 Yooxanaa 5:9-12). Hadiyo goor Yooxanaa waxa ka hadlayaa jaahilnimada dunida iyo indho la’aantooda ruux ahaaneed (1:10; 8:19, 55; 15:21; 16:3; 17:25), laakiinse waxa uu haddana adkaynayaa in uujada Wiilku u yimid ay tahay u dunida badbaadiyo (3:16) iyo inuu Aabbaha dunida u muujiyo (17:23) kuna gartaan Masiixa.

16:4 ujeedada Ciise ee waxsii sheegista ahi waxay ahayd inuu xerta dhiirri geliyo (13:19; 14:29).

NASB (UPDATED) TEXT: 16:5-11

⁵laakiin hadda waxaan u tegayaa kii i soo diray, midkiinna i weydiin maayo. Xaggee baad tegaysaa ⁶Waxyaalahaas aan idinkula hadlay aawadood, qalbigiinna murug baa ka buuxsantay. ⁷laakiin runta ayaan idiin sheega yaa, Waxaa idiin roon inaan tago. Haddaan tegin, Gargaaruhu idiinma iman doono, laakiin haddaan tago waan idiin soo diri doonaa. ⁸Isagu markuu yimaado wuxuu dunida ku caddayn doonaa xagga dembiga iyo xaqa iyo xukunka; ⁹xagga dembiga, waayo, way ¹⁰rumaysan waayeen; xagga xaqa. waayo, Aabbahaan u tegayaa, imana arki doontaan mar dambe, ¹¹xagga xukunka, waayo, kan madaxda dunida ah waa la xukumay.

16:5 “midkiinna i weydiin maayo. Xaggee baad tegaysaa” waxay u muuqataa inuu Butros su’aashan ku waydiiyay cutubka 13:36 hase ahaatee maskaxdiisa waxa kusoo dhacday silca ay mari doonaan marka uu iyaga ka tago Ciise iyadoo su’aashuna ahayd waxa ku dhici doona (aayadda 6). Dhinaca kale Yooxanaa 14:1-3 waxay ka waramaysaa tegitaanka Ciise ee samada (Falimaha Rasuullada 1:9-11).

Tani waa tusaale wanaagsan oo ina xasuusinaya in Injiilladu aan eray ahaan loo waxyoonin balse ay tahay diiwaan gelinta hadalladii Ciise. Sanado kaddib ayaana ujeedo fiqi ahaaneed loo diiwaan geliyay. Rasuulladu waxay haysteen xorriyada ah inay siyaabo kala duwan usoo tebiyaan ereyadii Ciise, mana aaminsani inay xaq u lahaayeen inay Ciise waxay doonaan yidhaahdaan wuu ku hadlay (eeg Gordon Fee iyo Douglas Stuart, *How To Read the Bible For All Its Worth*). Waxa laga yaabaa inuu fahiray ereyadii Ciise ujeedadooda fiqi ahaaneed iyadoo dad gaarah loogu bushaaraynayo, waana siyaabaha erayada Injiilladu mararka qaar u kala duwan yihiin!

16:6 “qalbigiinna murug baa ka buuxsantay.” Waa fal ebyan tusmayna gudbiyana. Imtixaankii iyo wixii Ciise kula hadlay waxay ahaayeen kuwo murogo keenaya (14:1; 16:6, 22). Erayga “qalbi” luqada Cibraaniga waxay tusinaysaa gebi ahaanba qofka dareenkiisa iyo fikirkiisa iyo doonistiisa intaba. Eeg Mawduuca Gaarka ah 12:40.

16:7 “Waxaa idiin roon inaan tago.” Suurta gal uma aha jidhka Ciise inuu inbadan sii joogo iyadoo taasi xaddidaysa waxbarista iyo adeegga xertiisa. Dhinaca kale adeegitaankii Ciise ee dhulku wuxuu ku koobnaa Israa’iil, sidaasi darteedna Ruuxa Quduuska ah ayaa furi doonay goobo kale oo cusub (Matayos 10:6; 15:24). Imaatinka Ruuxu waxa uu kordhin doonaa adeegga (Efesos 2:11-3:13).

Erayga “wanaagsan” waxa lagu dhex adeegsaday 11:50 iyo 18:14 iyadoo la xidhiidha dhimashada Ciise, halka erayga “tago” ay ka koobsanaysay gebi ahaanba dhacdooyinka usbuucii ugu dambeeyay ee noloshu Ciise ee dhulka.

▣ **“Haddaan tegin, Gargaaruhu idiinma iman doono”** waa labo jumlado shuruudood oo heerka saddexaad ah isla markaana faa’idanaya suurtaalnimada xaqiiqda arrintan. Waxa lagama maarmaan ah inuu Ciise tago si uu usoo diro Ruuxa! Erayga *paraclētos* waxa loo tarjumay “gargaare” (14:16, 26; 15:26, eeg fiirada 14:16) wuxuuna ka dhigan yahay mid kaalmayn wada. Eraygani waxa uu ka muuqanayaa qoraallada Yooxanaa iyadoo suugaan ahaan dhinaca Giriiggana looga adeegsaday looyar oo kale. Aayadaha 8-11 Ruuxu waxa uu ugu shaqaynayaa isagoo dunida silcinaya, Laakiin aayadaha 12-15 waxa uu u shaqaynayaa isaga oo rumaystayaasha garab taagan. Eraygan *paracletos* waxa sidoo kale loogu adeegsaday Wiilka sida ka muuqata 1 Yooxanaa 2:1. Asalka Giriig ahaana waxa loo tarjumi karaa “raaxeeye.” Marka macnahan ay samaynasana Aabbaha ayaa loogu adeegsaday 2 Korintos 1:3-11.

▣ **“waan idiin soo diri doonaa”** Aabbaha iyo Wiilku waxa ay wadaagaan soo dirista Ruuxa (14:26).

16:8 “markuu yimaado wuxuu dunida ku caddayn doonaa” u fiirso iyada oo shaqada Ruuxa Quduuska ah ee jihaynta ah iyo madax furashada Ciise in dadku u baahan yahay. Erayga “caddayn” wuxuu tilmaamayaa baadhitaan.

G. B. Caird, kitaabkiisa *The Language and Imagery of the Bible*, p. 159, ayaa saddexdan dhinac fahan ka bixinaya.

1. Waxa qaldanayd in Ciise la maxkamadeeyo dilna lagu xukumo
2. Waxay khalad ku ahayd macnaha denbiga
3. Waxay khalad ku ahayd macnaha xaqnimada
4. Waxay khalad ku ahayd macnaha xukunka

Haddii sidaas ay tahay Ruuxu waxa uu si buuxda u muujinayaa shakhsiyadda Ciise. Iyaga diintoodu ma badbaadin doonto, xukunkuna waxa uu sugayaa dhammaanba kuwa diida ciise! “denbigu” waa rumaysad la’aan, Ciisena waa jidka keliya ee Ilaah lagula noolaan karo! Erayga “duni” isna uu ka tusinayo dadka Ilaah ka geesta ah. Eeg Mawduuca Gaarka ah 14:17.

16:9 “xagga dembiga, waayo, way rumaysan waayeen” injiilku wuxuu tusinayaa in dadku u baahan yihiin xaqnimada Ilaah (Rooma 3:9-18, 23; 6:23; Efesos 2:1-3). Denbigu maaha waxa keliya ee badbaadada hor istaagaya, Laakiin waa rumaysad la’aanta Ciise iyo shuqulladiisa (Yooxanaa 3:6-21; 8:24, 26). Rumaysadku waxa uu ka kooban yahay fikir iyo dareen, Laakiin ugu horrayn waa doonis (eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23). Muhiimadda masiinayo rumaysadku rumaystaha shaqadiisa iyo shakhsiyaddiisa, Laakiin wuxuu muhiimadda siinayaa towbad keenka iyo ka jawaab celinta ballan qaadyada Ilaah ee ku sugan Masiixa (Rooma 3:21-30).

16:10 “xagga xaqa” middani waxay sheegaysaa baa laga yaabaa

1. Waxa Masiixu ku qabanayo Golgota iyo sarakicitiisa iyo kor u kicitaankiisa oo is dhammays tiraya (aayadda 10)
2. Kuwa isu malaynaya inay xaq yihiin iyaga oon rumaysan Masiixa, halka xaqu kaga jiro Masiixa oo kelidiis Ilaah hortiis xaq ku ah.

16:11 “xagga xukunka, waayo, kan madaxda dunida ah waa la xukumay” waxa iman doona maalin dhammaanba aadanaha iyo malaa’igaha leexday ay Ilaah hortiisa iman doonaan (Filiboy 2:9-11). Inkasta oo Shaydaanku dunidan awood ku leeyahay (12:31; 14:30; 2 Korintos 4:4; Efesos 2:2; 1 Yooxanaa 5:19), waxa uu noqon doonaa cadaw laga guulaysto. Isaga kuwa raacaana waxay heli doonaan cadhada Ilaah (8:44; Matayos 13:38; 1 Yooxanaa 3:8-10).

NASB (UPDATED) TEXT: 16:12-15

¹²Wax badan oo kalaan leeyahay inaan idiin sheego, laakiin imminka qaadi kari maysaan. ¹³Laakiin markuu kan Ruuxa runta ahu yimaado, wuxuu idhlku wadi doonaa runta oo dhan, waayo, isagu iskama hadli doono, wuxuuse ku hadli doonaa wuxuu maqlo, wuxuuna idiin sheegi doonaa waxa imanaya. ¹⁴Wuu i ammaani doonaa, waayo, waxayguu qaadi doonaa, wuuna idiin sheegi doonaa. ¹⁵Wax kasta oo Aabbuhu leeyahay anigaa leh. Sidaa daraaddeed waxaan idhi, Waxayguu qaadaa, wuuna idiin sheegi doonaa.

16:12 “imminka qaadi kari maysaan.” Erayga “qaadis” waxa loo adeegsadaa xayawaan wax qaada. Haddaba xertu may awoodi Karin fahanka

1. Silica Masiixa
2. Sarakiciidiisa
3. Adeegga kaniisadda ee ku waajahan dunida

Waxa lagama maarmaan ah akhristayaasha casrigani inay fiiro u yeeshaan Axdiga Cusub oo metalaya heer kala guur ah. Xertu may fahamsanayn arrimo dhawra ilaa kaddib sara kicistii iyo helitaankii Ruuxa Quduuska ah maalintii kontonaad ee Bentakostiga.

Waxa haddaba laga maarmaan ah Injiillada la qoray muddo kaddib, iyadoo loo qoray kooxo kala duwanaa, waxaanay koobsanayaan fiqi koritaan samaynayay.

16:13 “Ruuxa runta” Axdiga Hore dhexdiisa erayga “run” (alētheia) wuxuu tusinayaa run sheegnimada. Ciise wuxuu sheegay inuu yahay runta sida ka muuqata 14:6. Magacan oo lagu magaacabay Ruuxa Quduuskuna waxa uu tusinayaa doorka uu ka qaadanayo muujinta Ciise (14:17, 26; 15:26; 16:13-14; 1 Yooxanaa 4:6; 5:7). Eeg fiirada Yooxanaa 6:55.

▣ **“wuxuu idinku wadi doonaa runta oo dhan”** erayadani ma sheegayaan Ruuxa oo wax walba tusin doona, Laakiin waa waxyaalaha la xidhiidha arrimaha ruuxiga ah iyo waxbarista Ciise, waxaanu si gaara u jihatnayaa qorayaasha Axdiga Cusub. Dhinaca kalena wuxuu akhristayaasha ka caawinayaa inay gartaan runta ku jirta Injiilka. Eeg Mawduucyada Gaarka ah 6:55 iyo 14:26.

MAWDUUC GAAR AH: FAAHFAAHINTA

Ilaah waxa uu u shaqeeyay isagoo raba inuu isu muujiyo aadanaha, fiqi ahaana waxa lagu magacaabay waxyi. Waxa uu niman gaar ah u doortay inay diiwaan geliyaan oo sharraxaan waxyigiisa. Xagga fiqi ahaana waxa lagu magacaabay ilhaamin. Waxa uu Ruuxiisa u soo diray inuu akhristayaasha ka caawiyo fahanka eraygiisa. Fiqi ahaana middan waxa lagu magacaabay faahfaahin. Haddaba, dhibaatadu waxa ay imanaysaa marka aan nidhaahno Ruuxa ayaa ka qayb qaadanaya fahankeenna erayga Ilaah – haddaba maxay yihiin fasiraadahan badani?

Dhibaataada waxa ka qayb ah oo ka been sheegaya fahanka hore ee akhristaha amaba khibradaha shakhsi ahaaneed. Waxa marwalba dhacda in ujeedooyinka shaqsi ahaaneed lasoo jeediyo iyadoo kitaabka daliil ahaan loo adeegsanayo. Waxa dhacda in sidoo kale mararka qaarna kitaabka loo adeegsado dhinacyo gaar ah iyadoo loo adeegsanayo siyaabo kala duwan. Haddaba, faahfaahinta lama mid noqon karto ilhaaminta ama waxyiga Ruuxa Quduuska ah.

Qaabka ugu wanaagsani waxa weeyi iyada oo la sheego fikirka guud ee sadarku uu ka hadlyo, mana aha in qoraal kasta si faahfaahsan loo fasiro. Mawduucyada ayaana badanaa tusinaya qoraaga asalka ah ujeedadiisa. Kormarista cutubyada ayaa iyaduna waxay gacan ka gaysan karta fahanka ujeedada asalka ah ee qoraaga. Mufasiriintu maaha kuwo la ilhaamiyay dibna uma soo saari karno qoraaga nidaamkiisa fasiraadda. Waxa aan isku dayi karnaa inaan fahano waxyaalihii maalmohooda la odhan jiray ee lagu wada xidhiidhi jiray. Waxa jira qaybo ka mida kitaabka oo qarsoon ilaa wakhti. Sidoo kalena waxa jira inaanay qoraalladu waxyaalaha qaar isku waafaqayn, Laakiin waa inaan qaadano xaqiiqada dhexda ah inagoo u ogolaanayna mufasiriintu inay ku socdaan fahanka qoraaga asalka ah. Mufasiriintu waa inay ku socdaan iftiinka ay haystaan iyaga oo marwalba u furan kitaabka iyo Ruuxa. Ilaahna waxa uu inagu xukumi doonnaa heerka fahankeenna iyo sida aan fahankaas ugu noolaanno.

▣ **“isagu iskama hadli doono, wuxuuse ku hadli doonaa wuxuu maqlo, wuxuuna idiin sheegi doonaa waxa imanaya”** arrimahani imanayaa maaha kuwo mustaqbal ah (Agabus, Falimaha Rasuullada 21:10, eeg Mawduuca Gaarka ah 4:19) Laakiin waxay tilmaamayaan dhacdooyinka madax furashada ah: Golgota, sarakicista, samo aadista, iyo Bentakostiga. Sidi Ciise xaqa uu uga aqbalay Aabbaha ee uu xertana ugu gudbiyay, ayaa Ruuxa Quduuska ahina ugu gudbinayaa rumaystayaasha (eeg Mawduuca Gaarka ah 14:26). Aabbuhu isaga ayaa awoodda iska leh (1 Korintos 15:27-28).

16:14-15 “Wuu i ammaani doonaa, waayo, waxayguu qaadi doonaa, wuuna idiin sheegi doonaa.” Shaqada ugu muhiimsan ee Ruuxu waa inuu ka waramo Ciise Masixa (aayadda 15). Ruuxu isagu iskama hadlayo laakiinse wuxuu ka hadlayaa Ciise marwalba (14:26).

▣ **“Wax kasta oo Aabbuhu leeyahay anigaa leh”** waa sheegasho layaab leh! (3:35; 5:20; 13:3; 12:10; Matayos 11:27). Waxa jirta wada shaqayn iyo sinnaansho ka dhexeeya Saddexmidnimada. Sida Ciise Aabbaha u muujiyay ayaanu Ruuxu Ciise u muujinayaa.

NASB (UPDATED) TEXT: 16:16-24

¹⁶In yar dabadeed i arki maysaan, oo weliba in yar dabadeed waad i arki doontaan. ¹⁷Sidaa daraaddeed xertiisa qaarkood waxay isku yidhaahdeen, Waa maxay waxan uu inagu leeyahay, In yar dabadeed i arki maysaan, oo weliba in yar dabadeed waad i arki doontaan, iyo, Maxaa yeelay, Aabbahaan u tegayaa? ¹⁸Haddaba waxay yidhaahdeen, Waa maxay waxan uu leeyahay. In yar dabadeed? Garan mayno wuxuu leeyahay. ¹⁹Ciise ayaa garanayay inay doonayeen inay wax weydiyaan, oo wuxuu ku yidhi, Ma waxaad isweydiinaysaan xaalkan aan idhi, In yar dabadeed i arki maysaan, oo weliba in yar dabadeed waad i arki doontaan? ²⁰Runtii. runtii, waxaan idinku leeyahay, Waad ooyi doontaan oo barooran doontaan, duniduse waa farxi doontaa. Waad murugoon doontaan, laakiin murugaddiinnu waxay u rogman doontaa farxad. ²¹Naagtu goortay umulayso, way murugootaa, waayo, saacaddeeda timid, laakiin markay ilmaha umusho, dhibtii dib uma xusuusato farxad aawadeed, waayo, nin baa dunida ku dhashay. ²²Imminka haddaba waad murugsan tihii, laakiin mar dambe ayaan idin arki doonaa, qalbigiinnuna wuu farxi doonaa, farxaddiinnana ninna idinkama qaadi doono. ²³Oo maalintaasna waxba ima weydiin doontaan. Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Haddii aad wax uun weydiisataan Aabbaha, magacayga ayuu idinku siin doonaa. ²⁴Tan iyo imminka waxba magacayga kuma weydiisan. Weydiista, waanad heli doontaan, inay farxaddiinnu buuxsanto.

16:16 “In yar dabadeed” ereyadani dhowr jeer ayay kusoo noqnoqonayaa Injiilka Yooxanaa (7:33; 12:35; 13:33; 14:19). Waxaana laga yaabaa inay tilmaamayso

1. Muuqashada ka danbaysa sara kicista
2. Imaanitnka Labaad
3. Ciise oo ku imanaray Ruuxa Quduuska ah

Laakiin macnaha halkani waxa uu xoojinayaa muuqashada ka danbaysa sarakicista (aayadda 22). Erayadani haddaba xerta waa ay ka fajaciyeen (aayadaha 17-18).

16:17 “xertiisa qaarkood waxay isku yidhaahdeen” waa su’aal kale sida 13:36; 14:5, 8, 22. Ciise su’aalahan wuxuu u adeegsaday si uu u xoojiyo iimaankooda iyo si uu iyaga isugu muujiyo. Injiilka Yooxanaa haddaba wuxuu caan ku yahay adeegsiga wada hadallada si uu u muujiyo xaqiiqada. Waxa Injiilka Yooxanaa ku dhex sugan 27 wada sheekaysi oo ah Ciise ama kuwo kale.

▣ **“iyo, Maxaa yeelay, Aabbahaan u tegayaa”** Ciise waxa uu sidan ku sheegay 16:10, macneheeduna wuxuu la xidhiidha wax kusaasban Masiixa (13:1, 3; 16:28; 17:24).

▣ **“arki maysaan..arki”** labada fal ee halkan lagu adeegsaday way kala duwanyihiin Laakiin way isla xidhiidhaan, sidaas darteedna aayaddani waxay ka hadlaysaa wakhtiga u dhexeeya dhimashada iyo sarakicista Ciise.

Qaar ayaa aaminsan in labada loogala jeedo aragtida “jidh” ahaaneed iyo aragtida “ruux” ahaaneed iyagoo tilmaamaya (1) wakhtiga u dhexeeya qodbitaanka isku tallaabta iyo sarakicista ama (2) wakhtiga u dhexeeya tegitaanka samada iyo Imaatinka Labaad.

Xaqiiqi ahaantii falka (*theōreō*) waa fal taagan sida ku sugan aayadaha 16 iyo 17 ka labaadina (*horaō*) waa mustaqbal sida uu ugu jiro aayadaha 16 iyo 17, waxaanay u muuqataa inay taageerayaan fikrad isku mid ah.

16:18 “Haddaba waxay yidhaahdeen” waa fal aan dhammays tirnayn isla markaana loogala jeedo (1) inay hadalka sii wadeen (2) inay bilaabeen hadalka.

▣ **“Waa maxay waxan uu leeyahay”** hadiyo jeer kuwii arkay mucjisooyinkiisa ee dhegaystay may fahmin isaga (8:27, 43; 10:6; 12:16; 18:4). Tanina waa midda uu xaqiijin doono Ruuxa Quduuska ahi.

16:19 “Ciise ayaa garanayay inay doonayeen inay wax weydiyaan,” hadiyo goor Ciise waxa uu ogsoonaa waxa dadku ku fikirayaan (2:25; 6:61, 64; 13:11). Haddaba waxa adag in la garto inay tani ahayd (1) dabiicaddiisa Ilaahimo; (2) inuu awood u lahaa garashada dadka; ama (3) labadaba.

16:20 “Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay,” macno ahaan waa “Aamiin, Aamiin”(eeg Mawduuca Gaarka ah 1:51). “Aamiin” waxay ahayd erayga Axdiga Hore (*aman, emeth, emunah*) ee “rumays” (Xabquuq). Macneheeduna waa sugnaansho. Markii dambena waxa loo adeegsaday adkaynta hadalka, sidaasi darteedna hadallada Ciise waxay uga muuqanaysaa iyadoo tusinaysa kalsooni in lagu dhegaysta.

▣ **“Waad ooyi doontaan oo barooran doontaan”** oohinta iyo baroortu waxay ahayd caado dhaqameed Yuhuuddu ku cabiri jireen murugada (11:31, 33; 20:11). Ciise jamac ayuu adeegsanaya saddex jeer marka uu ka hadlayo murugada xerta (aayadda 20[labo jeer] iyo aayadda 22). Hoggaamintu waxay tahay

1. Adeegitaan
2. Diidmada dunida
3. Silica la mida ka Sayidka

▣ **“Waad murugoon doontaan, laakiin murugaddiinnu waxay u rogman doontaa farxad”** waa ballan qaad aad u wayn oo la siiyay xerta iyaga wareersan oo fahankoodu yaryahay. Dhammaanba wixii Ciise xerta u ballan qaadayna waxay rumoobeen markuu dhimashada ka sara kacay

1. Kamuu tegin (14:18; 16:16, 19; 20:19)
2. Wuu u yimid (14:18; 16:16, 19; 20:19)
3. Wuxuu siiyay nabad (16:22; 20:19)
4. Wuxuu siiyay Ruuxa Quduuska ah (15:26; 20:22)

16:21 “Naagtu goortay umulayso,” misaalkani waxa uu kusoo aroorayaa Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub labadaba, waxaana hadiyo goor loo adeegsadaa dhalmada, Laakiin ujeedada halkan looga socdaa waxay tahay, xaaladda hooyadu sida ay tahay wakhtiga foosha iyo dhalmada kaddib. Misaalkani haddaba waxa uu la mid yahay foosha ka hormaraysa casriga cusub (Ishacyaah 26:17-18; 66:7-14; Markos 13:8). Haddaba, xanuunkan ayuu Ciise sheegayay laakiinse xertu may fahmin, maxaa yeelay weli dhica kale ayay ka jooheen isku tallaabta sarakicista iyo samo aadista.

16:23 “maalintaasna” wuxuu xanbaarsan yahay macne Cibraani ah (sida foosha aayadda 21) oo la xidhiidha fahanka imaatinka Casriga Cusub (14:20; 16:25, 26).

▣ **“waxba ima weydiin doontaan”** waxa jira labo eray oo kala duwan oo ay leedahay “su’aal” ama “waydiin” aayaddan dhexdeeda (aayadda 26). Ka hore waxa uu tusinayaa “waydiinta su’aal” (16:5, 19, 30). Haddii markaas ay tahay sidan Ciise waxa uu ka hadlayaa su’aalaha lagu dhex sheegay cutubyadan 13-17 (13:36; 14:5, 8, 22; 16:17-18). Erayga labaadna waxa uu yahay tilmaamitaanka imaatinka Ruuxa Quduuska ah (14:16-31; 15:26-27; 16:1-15), oo ka jawaabi doono su’aalohooda.

Erayadani waxay I xasuusiyaan ballan qaadka “axdiga cusub” ee Yeremyaah 31:31-34. Halkaasoo imaatinka casriga cusubi uu aqoon buuxda u keeni doono dhammaanba rumaystayaasha.



NASB “Haddii aad wax uun weydiisataan Aabbaha, magacayga dartiis”
NKJV “waxkastood Aabbaha ku waydiisataan magacayga”
NRSV “haddaad Aabbaha waxkasta ku waydiisataan magacayga”
TEV “Aabbuhu wuxuu idin siin doonaa waxkastoo aad magacayga ku waydiisataan”
NJB “waxkastoo Aabbaha aad waydiisataan magacayguu idinku siin doonaa”

Weedhani maaha weedh shuruudeed, waxaana haboon in la ogsoonaado ku waydiishada magaca Ciise inaanay ahayn iyadoo magaciisa tukashada lagusoo xidho, laakiinse waa in doonistiisa iyo waxbaristiisa ay noqoto (1 Yooxanaa 5:13). Eeg fiirada 15:16. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 3:22.

Waxaan caddayn iyada oo erayga “magacayga” ay tusinayso in “lagu waydiisanayo” iyo inay “lagu helayo”? macnuhu waxa uu la xidhiidhaa salaadda, sidaasi darteedna waxay noqon kartaa ku waydiishada, inkastoo waxkastaa Aabbaha kaga yimaadaan dhinaca Masiixa (14:13, 14; 16:15, 24, 26). Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 14:14.

16:24 “Weydiista, waanad heli doontaan” waa fal amar ah oo ku dhisan garasho isla markaana tusinaya muhiimadda ay leedahay tukashada aan kala go’a lahayn ee rumaystuhu. Macnuha halkan ka muuqdaa waa iyadoo markeliya ah, Laakiin waditaanka salaaddu waxa uu tusinayaa xidhiidhka aan kala go’a lahayn ee Ilaah lala leeyahay (Matayos 7:7-8; Luukos 11:5-13; 18:1-8).

▣ **“inay farxaddiinnu buuxsanto”** waa magaca fal sameeyaha aan la garanayn (1 Yooxanaa 1:4). Salaadda la aqbalaa waxay Sabab u tahay farxaddeena, faraxuna waa waxyaalaha lagu garto kuwa Ciise raaca (15:11; 16:20, 21, 24; 17:13).

NASB (UPDATED) TEXT: 16:25-28

²⁵Waxyaalahaas ayaan masaallo idinkula hadlay. Waxaa imanaysa goortii aanan mar dambe masaallo idinkula hadli doonin, laakiin aan bayaan idiinkaga warrami doono Aabbaha. ²⁶Maalintaas waxaad ku weydiisan doontaan magacayga. Idinkuma lihi inaan Aabbaha baryayo daraaddiin. ²⁷Waayo, Aabbaha qudhiisu wuu idin jecel yahay, maxaa yeelay. waad i jeclaateen, oo waadna rumaysateen inaan xagga Ilaah ka imid. ²⁸Aabbaha ayaan ka imid oo aan dunida imid. Haddana waan ka tegayaa dunida oo Aabbahaan u tegayaa.

16:25 “masaallo” waxbaristii Ciise waxay ahayd: (1) fahansiin iyo (2) faham daboolan (Markos 4:10-11; Ishacyaah 6:9-10; Yeremyaah 5:21). Qalbiga dhegaystuhu waxa weeyi furaha fahanka, laakiinse waxa jirta waxyaalo fahankoodu qarsoonaa ilaa dhacdooyin gaar ah (qodbitaanka isku tallaabta, sara kicista, tegista samada,) iyo Bentakostiga.

Muuqashadii labadii ku socday Emmaus (Luukos 24:13-35) ayaa ina tusin karta sida Ciise Rasuullada wax u baray (aayadaha 25-27, 32). Isaga laftiis ayaa markuu soo saro kacay tusiyay sida Axdiga Hore uga hadlay adeegitaankiisa. Kanina waa tusaalaha wacdintii Butros ee ku sugan Falimaha Rasuullada (*kerygma*, eeg Mawduuca Gaarka ah 5:39).

▣ **“bayaan idiinkaga warrami doono”** eeg Mawduuca Gaarka (*Parrhēsia*) ah 7:4.

16:26 “Maalintaas waxaad ku weydiisan doontaan magacayga. Idinkuma lihi inaan Aabbaha baryayo daraaddiin” aayaddani waxa ay gudbinaysaa xaqiiqo muhiim ah iyada oo kuwo badani manta rumaysan yihiin inaan Ilaah si toosa loogu dhowaan Karin! Si kastaba ha ahaatee kitaabku wuxuu inaba barayaa:

1. In Ruuxu u tukanayo rumaystayaasha (Rooma 8:26-27)
2. In Wiilku u shafeeca qaadayo rumaystayaasha (1 Yooxanaa 2:1)
3. Rumaystayaashu waxay Ilaah ugu dhowaan karaan Masiixa aawadiis

16:27 “Aabbaha qudhiisu wuu idin jecel yahay,” erayga jacayl oo ah *phileō* waxa sidoo kale loogu adeegsaday 5:20 jacaylka Aabbahu u qabo Ciise. Waa hadal cajiib leh oo tusinaya sida kusoo aroortay Yooxanaa 3:16 (which uses *agapaō*). Ilaah maaha mid is bedbedela, laakiinse waa Ilaah jacayl ah oo Ciisena kala shaqaynaya ujeedada badbaadada.



NASB “xagga Aabbaha”
NKJV, NRSV, TEV, NJB “xagga Ilaah”

Waxa jira labo qoraal gacmeed oo kala duwan: (1) “Ilaah” ama “Aabbe” iyo (2) joogitaanka ama maqnaanshaha shaqalka. “Ilaah” waxa uu ka muuqanayaa MSS P⁵, κ², A, iyo N, halka “Ilaaha” ay ka muuqanayso MSS C³ iyo W. Waxay u muuqataa inay adagtahay oonay caadi ahayn erayayntu, waxaanay ka mid tahay dhaleecaynta qoraallada, waxaana suurto gala asal ahaan in culimadu isku dayeen habayntooda. United Bible Society ayaa Axdiga Cusub ee Giriigga ah waxay ku darayaan “C” iyadoo lagu tirinayo (go’aan qaadasho adag).

Si kastaba ha ahaatee, “Aabbe” waxay ka muuqanaysaa κ¹ iyadoo “Aabbuhu” iyana ka muuqanayso B, C*, D, iyo L. waxayna ku habboontahay macnaha.

▣ **“maxaa yeelay. waad i jeclaateen, oo waadna rumaysateen inaan xagga Ilaah ka imid”** waa labo fal oo dhammays tiran tusmayna ah. Jacaylka iyo rumaysadka ciise waxa ay tusinayaan weheshiga Aabbaha. Qormada ku sugan *A Translator’s Handbook on the Gospel of John* oo ay leeyahay Barclay Newman iyo Eugene Nida ayaa aad u xiiso leh.

“Hadalladani waxa ay tusinayaan marka loo eego Yooxanaa fahanka jacaylka, addeecitaanka, iyo rumaysadku, inay yihiin siyaabo kala duwan oo lagu cabirayo xidhiidhka qof la leeyahay Wiilka.” (p. 518).

Wax ku saabsan “rumaysateen” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23.

16:28 “Aabbaha ayaan ka imid oo aan...imid” waa fal tegay oo uu raacsanyahay fal ebyan. Ciise waxa uu ku dhashay Beytlaxam (jidh soo qaadashada) natiijada imaatinkiisuna waa daa’imis (“had iyo goor waan idinla jiraa” Matayos 28:20). Xaqiiqada ah inuu Ciise ka yimid Aabbaha (aayadda 27, 30; 8:42; 13; 17:8) waxay tusinaysaa

1. Jiritaankiisii hore
2. Ilaahnimadiisa
3. Muujintiisa buuxda ee Aabbaha uu muujinayo

▣ **“Haddana waan ka tegayaa dunida oo Aabbahaan u tegayaa.”** Waxa ay tani tilmaamaysaa tegitaankiisa samada iyo bilowga adeegga “Gargaaraha” iyo adeegga shafeeca qaadista ah ee Ciise (Cibraaniyada 7:25; 9:24; 1 Yooxanaa 2:1). Sida jiritaanka Ciise ee hore loogu sheegay Yooxanaa 1:1, ayaa sidoo kale inuu ammaan iyo awood kusoo laaban doono loogu sheegay aayadaha (17:5, 24).

NASB (UPDATED) TEXT: 16:29-33

²⁹Xertiisii ayaa ku tidhi, Bal eeg, bayaan baad hadda u hadlaysaaye, oo masaal ku hadli maysid.
³⁰Imminka waannu garanaynaa inaad wax walba taqaan, oo aadan u baahnayn qofna inuu wax ku weydiiyo. Taas aawadeed waannu rumaysan nahay inaad Ilaah ka timid. ³¹Ciise ayaa ugu jawaabay, Hadda ma rumaysan tihiiin? ³²Ogaada, saacaddii baa imanaysa, waana timid, kolkaad u kala firdhi doontaan mid kasta xaggiisa, anna keligay baad iga tegi doontaan, oo weliba keligay ma ihi, waayo, waxaa ila jooga Aabbaha.
³³Waxyaalahaas waxaan idiinkula hadlay inaad nabad igu haysataan. Dunida ayaad dhib kala.

16:29 “bayaan baad hadda u hadlaysaaye,” eeg Mawduuca Gaarka (*Parrhēsia*) ah 7:4.

16:30 waxa habboon in aayaddan lagu fasiro fahanka iftiiminta Ciise uu ku garanayay su’aasha xerta ee aayadda 19. Waxa ay aayaddani tusinaysaa rumaysadkooda koraya, ee ilaa hadda aan dhammayska tirmin. Waxbadan bay arkeen oo maqleen, Laakiin dhacdadani (aayadda 19) ma noqon doontaa is beddelka fahankooda? Aniga waxay iila muuqataa mid ka mida hadalladii Butros ee fiirsashada lahaa balse ilaa hadda aan sida fiican loo fahmin (eeg The Jerome Biblical Commentary, p. 456).

16:31 “Hadda ma rumaysan tihiiin?” waxa laga yaabaa inay tani tahay su’aal ama hadal tusinaya inaanu rumaysadka Rasuulladu weli dhammays tirmin. Iimaankeena ugu horreeyay ee daciifka ah Ilaah waxa uu aqbalayaa marka aan fahankeena kaga jawaab celino Ciise. Rumaysad yaraanta xertu waxa uu soo baxay markii Ciise la xukumayay ee ay ka carareen.

16:32 “kolkaad u kala firdhi doontaan mid kasta xaggiisa, anna keligay baad iga tegi doontaan” waxa muuqata in Yooxanaa oo keli ahi xaadir ahaa markii maxkamadaynta iyo isku tallaab ku qodbiddu (Matayos 26:31, xigasho Sekaryaah 13:7). Yooxanaa 21:1-3 waxay tusinaysaa in kuwo ka mid ahaa Rasuulladu ay isaga laabteen kalluumaysi. Ciise waxa uu ka cawday ka fogaanshaha saaxiibtinimada aadanaha (Matayos 26:38, 40-41, 43, 43), laakiinse muu waayin la joogitaanka Ilaah marka laga reebo markuu isku tallaabta saarnaa isaga oo qaadaya denbiyada dadka (Matayos 27:45-46).



NASB “gurigiisa uu leeyahay”
NKJV “xaggiisa”
NRSV “gurigiisa”
NJB “jidkiisa”
TEV “guryihiinna”
REB, NET, NIV “gurigiisa uu leeyahay”

NKJV waxa uu tusinayaa macno ahaan. Badanaana tarjumaadaha Ingiriisidu waxay sheegayaa mid kastaa gurigiisa. Bultmann ayaa waxa uu ku sheegayaa “hanti” ama “milkiyado” (NIDOTTE, vol. 2. P. 839), isagoo Ciise ku tilmaamaya abuuraha (1:3; 1 Korintos 8:6; Kolosay 1:16; Cibraaniyada 1:2).

16:33 “inaad nabad igu haysataan” waa fal taagan oo wax loo tiirinayo (14:27). Nabadda dhinacyadeeda oo dhammi waxay ku jirtaa Ciise, eeg Mawduuca Gaarka ah 14:27.

▣ **“dunida”** Yooxanaa eraygan waxa uu u adeegsanayaa isagoo tilmaamaya aadanaha oo ka leexday Ilaah. Eeg Mawduuca Gaarka ah ee *Kosmos* 14:17.

▣ **“dhib kala kulantaan”** cadaadiska iyo dhibka Ciise waajahay, iyagana wuu soo food saari doonay (15:18-25; Matayos 5:10-12; Falimaha Rasuullada 14:22; 1 Tesaloniika 3:3). Dhibaatadu (*thlipsis*) waa mid lagu garto kuwa Ciise sida runta ah u raaca.

Muuujinta dhexdeeda waxa jira farqi u dhexeeya “cadho” iyo “silcin.” Cadhada Ilaah kuma dhacdo rumaystayaasha, Laakiin cadhada kuwa aan rumaysadka lahayn ayaa iyaga ku dhacda. Dunidu inay carruurta Shaydaanka yihiin waxay ku muujinayaan weerarka ay ku qaadeen “nuurka dunida” (1:1-18; 3:17-21)!

▣ **“alsoonaada”** waa fal amar ah oo garasho ku dhisan (Matayos 9:2, 22; 14:27; Markos 6:50; 10:49; Falimaha Rasuullada 23:11). Waxay la mid tahay hadalladii YHWH kula hadlay Yashuuca (Yashuuca 1:6, 9, 18; 10:25).

▣ **“anaa ka adkaaday dunida”** waa fal ebyan oo tusmayn ku dhisan. Guusha waxa la damaanad qaaday Getsamane ka hor, Golgota ka hor, iyo xabaasha ka hor (Rooma 8:37; 1 Korintos 15:57; 2 Korintos 2:14; 4:7-15)! Ilaahna isaga ayaa wax walba gacanta ku haya.

Sida Ciise uu dunida uugaga guulaystay jacayl iyo addeecitaanka Aabbaha, ayaa sidoo kale rumaystayaashunu ay uugaga guulaysan doonaan (1 Yooxanaa 2:13-14; 4:4; 5:4-5; Muujintii 3:21; 12:11).

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu yahay xidhiidhka ka dhaxeeya labada cutub ee 15 iyo 16?
2. Iyadoo la xidhiidha aayadda 5, sideen u fahmi karnaa 13:36?
3. Maxay yahay adeegga Ruuxa Quduuska ahi u qabanayo dunida luntay?
4. Muxuu Ruuxa Quduuska ahi u qabanayaa rumaystayaasha?
5. Aayadaha 26-27 maxay tahay muhiimadda ay u leeyihiin madaahibta ama kooxa diimeedyada casrigan jira?

YOOXANAA 17

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Tukashadii Ciise	Ciise oo naftiisa u tukaday	Tukashadii heerka sarraysa ee Ciise	Ciise oo u tukaday xertiisa	Tukashadii Ciise
17:1-5	17:1-5	17:1-5	17:1-5	17:1-23
17:6-19	Ciise oo u tukaday xertiisa 17:6-19	17:6-19	17:6-8 17:9-19	
17:20-26	Ciise wuxuu u tukaday rumaystayaasha oo idil 17:20-26	17:20-24 17:25-26	17:20-23 17:24-26	17:24-26

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDEEDA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-26

- A. Asalka Taakh ahaaneed
 1. Cutubkani waxa uu koobsanayaa salaaddii Ciise ugu tukanayay
 - a. Naftiisa (aayadaha 1-5)
 - b. Xertiisa (aayadaha 6-19)
 - c. Rumaystayaasha mustaqbalka (aayadaha 20-26) jawiga guud ee tukashadanina waa kalsooni ee maaha calool xumaansho (16:33).

2. Tani waa tukashada Ciise ee ugu dheer kuna diiwaan gashan Axdiga Cusub
3. Waxa adag cutubkan in mawduucyo loo qaybiyo waayo wuu iskusoo noqnoqonayaa, tusaale ahaan erayada inta badan soo noqnoqonayaa waa “ammaan, ” “siin, ” “garasho, ” “diris, ” “magac, ” “dunida, ” iyo “mid.”
4. Ruuxa Quduuska cutubkan waxba lagagama sheegin inkasta oo in badan uu ka muuqanayo cutubyada 14-16.

B. Sifooyinka ardayda oo ku sugan aayadaha 6-19

1. Waa la doortay
2. Waa addeecayaal
3. Waxay garanayaan Ilaah iyo Masiixa
4. Runtay aqbalaan
5. Ciise iyaguu u tukaday
6. Duniday joogayaan
7. Awoodda Ilaah ayaa dhowraysa
8. Waxay mid u yihiin sida Aabbaha iyo Ciise midka u yihiin
9. Waxay haystaan farxaddiisa
10. Dunidan kamay ahaanin
11. Waxa quduus lagaga dhigay runta
12. Sida Masiixa loo soo diray ayaa iyagan loo diray
13. Waxa loo jecelyahay sida Aabbuhu u jeclaaday Ciise

C. Erayga “ammaan” Yooxanaa dhexdiisa

1. Waxa jirta in ka badan 25 eray oo Cibraani ah loona tarjumay erayga Giriigga ah ee “*doxa*” Sebtujantiga dhexdiisa. Erayga muhiimka ah ee ku sugan Axdiga Hore waa *kabod*, oo macnihiisu yahay “ka duwan, ” “miisaan, ” “culays, ” “sumcad, ” “mutaystay, ” “sharaf, ” ama “iftiin/wanaag.”
2. Erayga Giriigga ah ee *doxa*, waxa laga soo dhegtay falka ah “fikiris” oo macnihiisu yahay sumcad.
3. Yooxanaa dhexdiisa eraygani waxa uu la xidhiidhaa waxyaalo dhowr ah:
 - a. Ammaanta Ilaah (aayadaha 5, 24; 1:14; 12:40; 12:16)
 - b. Muujinta Ilaah ee ku sugan mucjisooyinka iyo waxbarista Ciise iyo shaqooyinka usbuuca xanuunka (aayadaha 4, 10, 22; 1:14; 2:11; 7:18; 11:4, 40)
 - c. Gaar ahaan isku tallaabta (aayadaha 1, 4; 7:39; 12:123; 13:31-32)
 Shaki kuma jiro in waxyaalahani isa soo dhex galayaan, laakiin xaqiiqadu waxa weeyi Ilaaha aan la arki karin oo naftiisa ku dhex muujiyay shakhsiyadda Ciise Masiix iyo shuqulladiisa.

BARASHADA EREYADA AAYADAHHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 17:1-5

¹Waxyaalahaas Ciise ayaa ku hadlay, markaasuu indhihiisii kor u qaaday xagga samada oo yidhi, Aabbow, saacaddii way timid. Ammaan Wiilkaaga inuu Wiilku ku ammaano, ²sidaad amar ugu siisay dadka oo dhan inuu nolosha weligeed ah siiyo kuwaad isaga siisay oo dhan. ³Tanu waa nolosha weli geed ah inay ku gartaan. adoo ah Ilaaha runta ah oo keliya iyo inay gartaan Ciise Masiix, kii aad soo dirtay. ⁴Dhulka ayaan kugu ammaanay. anoo dhammeeyey shuqulkaad ii dhiibtay inaan sameeyo. ⁵Haddana. Aabbow, adiga qudhaadu igu ammaan ammaantaan kula lahaa intaan dunidu jirin.

17:1 “Waxyaalahaas Ciise ayaa ku hadlay, ” waxa ay tilmaamaysaa waxyaalihii uu ku hadlayay sida ku sugan cutubyada 13-16.

▣ “markaasuu indhihiisii kor u qaaday xagga samada” tani waxa ay ahayd dhaqan ahaan salaadda sidii lagu samayn jiray: gacmohoo iyo madaxa oo kor loo taago, iyo in samada la eego sidii oo Ilaah lala sheekaysanayo (11:41; Markos 7:34; Luukos 18:13; Sabuurka 123:1). Ciise si joogto ah ayuu u tukaday waana sida uu qorayo Injiilka Luukos 3:21; 5:16; 6:12; 9:18, 28; 11:1; 22:41-45; 23:34.

▣ **“Aabbow”** in badan ayaa Ciise eraygan ku hadlay (11:41; 12:27, 28; Matayos 11:25-27; Luukos 22:42; 23:34). Ciise waxa uu ku hadlay luqada Aramaatiga iyadoo erayga *Abba*, uu yahay magac tusinaya jacayl ilmuhu aabbihiis uu u adeegsado (Markos 14:36). Waxa laga yaab in middanina ay marar badan ka yaabisay kuwii aan ahayn xerta Ciise!

▣ **“saacaddii way timid”** Waxa ay tilmaamaysaa Ciise oo garanayay wakhtiga adeeggiisa (2:4; 7:6, 8, 30; 8:20; 12:23; 13:1). Isaga kumay imanin arrin kedis ah oonu ka war haynini.

▣ **“Ammaan Wiilkaaga”** waa fal amar ah oo garasho ku dhisan. Hadiyo goor Ciise dhimashadiisa wuxuu ku tilmaamay erayo isu eeg (aayadda 4; 7:39; 12:23; 13:31-32). Tanina waxay la xidhiidhaa Ciise Ilaahnimadiisa iyo jiritaankiisa hore (1:14 iyo aayadaha 5, 24). Shuqullada Ciise waxay ammaaneen Aabbaha, waxaana jirta inay Wiilka iyo Aabbuhu si u wada macaamaloodaan. Eeg fiirada 1:14 iyo Macnaha Guud C.

Wax ku saabsan “Wiil” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 3:8.

Waxa jira kala duwanaansho qoraal gacmeedyada ah oo la xidhiidh “Wiil.”

1. Wiil iyada oo wadata Shaqal waxay ku soo arooraysaa MSS P⁶⁰, a, B, C*, W
2. Wiil iyada oo wadata magac u yaalna waxay kusoo arooraysaa MSS A, D, C² UBS⁴ ku waxa ku dhigayaa #1 “B” da isagoo ku tirinaya (hubaal).

17:2 “amar ugu siisay dadka oo dhan” Waa hadal wanaagsan oo kasoo baxay nijaar (Yooxanaa 5:27; Matayos 11:27; 28:18; Luukos 10:22). Erayga ah “amar”(exousia) waxay la mid tahay midda lagu adeegsaday 1:12; 5:27; 19:10, 11. Waxa sidoo kale loo tarjumi karaa “awood.”

Erayada iyaguna ah “dadkoo dhan” (Cibraaniyada waxa loogu adeegsaday aadanaha oo dhan Bilowgii 6:12; Sabuurka 65:2; Ishacyaah 40:5; 66:23; Yoo’eel 2:28).

▣ **“kuwaad isaga siisay oo dhan”** erayadani waxay waxay ku socdaan xerta iyagoo ah jidhka Masiixa oon ahayn keli! Falka dhammayska tiranina waxa uu tilmaamayaa siinta oo daa’imisa, waxaana loogala jeedaa ogaanshihii hore iyo doorashada (aayadaha 6, 9, 12; 6:37, 39; Rooma 8:29-30; Efesos 1:3-14). Doorashada Axdiga Hore dhexdiisa waxay ahayd adeegitaan, halka Axdiga Cusub ay ka tahay badbaadada weligeed ah iyadoo sidoo kalena xerta loogu yeedhay adeegitaan. Doorashada maaha shaqo Ilaahi ah oo keliya, laakiin sidoo kale waa masuuliyad aadanaha saaran guudkooda. Mana aha dhimashada oo keliya balse waa xitaa nolosha! Rumaystayaasha waxa loo doortay quduusnaan (Efesos 1:4), loomana dooran inay mansab ku raaxaystaan. Ma habboona in aayaddan loo fasiro iyadoo Ilaah uu Ciise siinayo dadka badhkood isaga oo kuwa kalena ka tegaya.

MAWDUUC GAAR AH: DOORASHO

Doorashadu waa mad’han aad cajiib u ah. Arrintu si kastaba ha ahaatee, laakiin ma aha wax la iska samaysan karo ee waa u yeeris in aad noqoto durdur, qalab oo aad kuwa kale madax furasho u noqotid! Axdigii hore ereyga waxaa loo isticmaali jiray marka ugu horraysa adeeg, Axdiga Cusubna waxaa loo isticmaalay marka ugu horraysa badbaadada. Kitaabka Qudduuska ah marna wax is burinaya kam uusam dhigin qorshaha Ilaah iyo doorashada xorta ah ee aadanaha, laakiin wuu xoojiyaa labadaba. Tusaale wanaagsan oo aan qaadan karno oo ku saabsan xiisadda baybalka waxaa ka helaynaa Rooma 9 ee ah Doorashada Ilaaha qaaddir ah iyo Rooma 10 oo ah jawaabta lagama maarmaanka ah ee laga doonayo aadanaha (cf. 10:11, 13).

Furaha xiisaddan barashada Ereyga Ilaah waxaa laga heli karaa Efesos 1:4 Ciise ayaa ah ninka Ilaah u doortay in kuwa kale oo dhan isaga ay doorasho ku helaan. (Karl Barth). Ciise waa “Haada” Ilaah ee baahida aadanihii dhacay (Karl Barth) Efesos 1:4 waxa ay sidoo kale caawinaysa iyaga oo sheegaya in yoolka iyo doorashadii hore aysan ahayn in la galo jannada, laakiin qudduusnimo (U ekaanta Masiixa). Had iyo jeer waxaa na soo jiita faa’iidooyinka ku jira Injiilka masuuliyadha se waannu iska dhego tirnaa! Uyeerista Ilaah (Doorashada) waxay leedahay waqti si la mid ah si nolosha weligeed ah oo kale!

Mad’habuhu waxa ay ku xiriir lala yeesho rumaysadyada kale, ma aha mid keliya, run aan isku xirnayn. Isla socoshada wanaagsan waxa ay tahay in aayadaha laga dhigo in ay yihiin sidii hal xiddig oo kale. Ilaah wuxuu runta u soo diraa bariga, ma aha galbeedka ma aha nooc. Waa in aynaan kala qaadin maxaa yeelay waxay siugu xiran yihiin hab isu sar go’an.

Barashada tiyooloji ahaaneed ee “axdiga” waxa ay midaynaysaa sarraynta Ilaah (in mar kasta uu leeyahay

go'aanka uu doonayo in uu wax ku habeeyo) oo leh bilow la qorsheeyay iyo iyo tawbadkeen cosda, iyo jawaab rumaysad oo ka timaaddo aadanaha (Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21). Ka taxaddar in aad hal qayb ka qaadatid qoraalka wada socda oo aad qaybta kalena ka tagtid! Ka taxaddar in aad qaadatid go'aan adiga ku gaar ah oo aad ku tafsiiranaysid mad'habtaad leedahay ama hab kale oo tiyoojagi!

▣ **“inuu nolosha weligeed ah siiyo”** nolosha weligeed ahi waa hadiyad Ilaah ku bixiyo Masiixa (5:21, 26; 6:40, 47; 10:28; 1 Yooxanaa 2:25; 5:11). Waxa ay la macno tahay “nolosha Ilaah,” “nolosha casriga cusub,” ama “nolosha sarakicista.” Waxa ay gaarka ku tahayna waa tayadeeda ee maaha dherarkeeda (10:10).

17:3 “Tanu waa nolosha weli geed ah” tani waa sida Yooxanaa uu nolosha weligeed ah u tilmaamayo waxaanu Masiixiyadda inaga tusinayaa labo xaqiiqo: (1) midnimada Ilaah (Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-6) iyo (2) Ciise oo ah Masiixa Ilaahnimona leh (2 Samuu'eel 7). Noloshan weligeed ahina maaha wax mustaqbalka ah, laakiin mid imika diyaar ku ah oo lagu heliyo Ciise Masiix.

▣ **“inay ku gartaan”** waa fal tegay oo ku dhisan nisbeyn. Waxa halkan laga wadaa maaha garashada caqli ahaaneed ee Ilaah oo keliya, laakiin waa xidhiidh shakhsi ahaaneed oo isaga lala yeesho. Ciisena waa Masiixii la sugayay ee sida dhammayska Ilaah u muujinayay (1:12, 14; Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:3), dadkana waxa waajib ku ah inay rumaystaan, aqbalaan, towbad keenaan, addeecaan oo isaga u hoggaansamaan.

▣ **“Ilaaha runta ah oo keliya”** Axdiga Hore waxa uu ka hadlayaa jiritaanka Ilaah keliya (Baxniintii 8:10; 9:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 4:35, 39; 6:4; 33:26; 1 Samuu'eel 2:2; 2 Samuu'eel 7:22; 1 Boqorradii 8:23; Ishacyaah 37:20; 44:6, 8; 45:6-7, 14, 18, 21, 22; 46:9; Yooxanaa 5:44; 1 Korintos 8:4, 6; 1 Timoteyos 1:17; 2:5; Yuudas aayadda 25). Sababta Axdiga Hore uga hadlayo jiritaanka iyo kelinimada Ilaah waxa ay tahay iyada oo bariga dhexe wakhtiyadii hore ay ka jiri jireen kuwo badan oo aaminsanaa ilaahyo badan. Haddaba waxa jira Ilaah keliya iyo ilaahyo beena oo dadku rumaystaan (Baxniintii 15:11; Sharciga Kunoqoshadiisa 3:24; Sabuurka 86:8; 89:6).

Axdiga Hore wuxuu tusinayaa caqiidada ah Ilaah keli ah oo sarreeyaa inuu jiro, sidoo kalena waxa jira ilaahyo soke oo dadku samaystaan (ilaahyo badan [*elohim*], laakiin Ilaaha keliya ee Israa'iil). Muuse waxa uu ka hadlayaa joogitaanka waxyaalo kale oo ruuxi ah, laakiin taas macneheedu maaha in ilaahyada dadka ee kale ay run yihiin, waxaana ka danbeeya sanamyada ka danbeeya shaydaan (1 Korintos 10:19-20).

Ilaah waxa lagu sifeeyay inuu yahay “run”(*elēthinos*). Eraygan iyo erayada la xidhiidha (*alēthēs*) inbadan ayaa lagu adeegsaday Yooxanaa qoraalladiisa. Tusaalaha Axdiga Hore u asalka ahina waxa uu noqonayaa runsheegnimo (*emeth*). Asalka Giriigga ahina wuxuu noqonayaa sidii wax si cad loo muujiyay. Macnaha kalena runtuna waxay kasoo horjeeda beenta (Tiitos 1:2). *Inos* oo xagga danbe ka raacda erayga Giriigga ah (*alēthinos*) waxay tusinaysaa shayga wax ka yimaaddeen ee laga sameeyay. Haddaba waxa suurto gal ah adeegsiyadan soo socdaa inay guud ahaan tilmaan ka bixinayaan.

MAWDUUC GAAR AH: “RUNTA” IYO QORAALLADA YOOXANAA

1. Ilaaha Aabbaha ah
 - a. Ilaah waa runsheege (Yooxanaa 3:33; 7:18,28; 8:26; 17:3; Rooma 3:4; 1 Tesaloniika 1:9; 1 Yooxanaa 5:20; Muujimntii 6:10)
 - b. Jidadka Ilaah hadiyo goor waa run (Muujintii 15:3)
 - c. Xukunka Ilaah waa run (Muujintii 16:7; 19:2)
 - d. Hadallada Ilaah waa run (Muujintii 19:11)
2. Ilaaha Wiilka ah
 - a. Wiilku waa run/xaq
 - 1) Nuurka runta ah (Yooxanaa 1:9; 1 Yooxanaa 2:8)
 - 2) Canabka runta ah (Yooxanaa 15:1)
 - 3) Waxa ka buuxda nimco iyo run (Yooxanaa 1:14,17)
 - 4) Isagu waa xaq (Yooxanaa 14:6; 8:32)
 - 5) Isagu waa run (Muujintii 3:7,14; 19:11)

- b. Markhaati furka Wiilku waa run (Yooxanaa 18:37)
- 3. Macnaha isbarbardhigga
 - a. Sharciga Muuse iyo Ciise nimcadiisa iyo runtiisa (Yooxanaa 1:17)
 - b. Waababkii bannaanka iyo kuwa samada (Cibraaniyada 8:2; 9:1)
- 4. Yooxanaa eraygan wuxuu u adeegsanayaa isagoo sifaynaya Aabbaha iyo Wiilka iyo inay lagama maarmaan tahay gudbinta farriintoodu (Yooxanaa 4:13; 19:35; Cibraaniyada 10:22; Muujintii 22:6).
- 5. Yooxanaa tilaamaantan wuxuu u adeegsanayaa isagoo sheegaya kelinimada Ilaah iyo runtiisa (5:44; 1 Yooxanaa 5:20) iyo in Ciise yahay muujinta Ilaah ee dhammayska tiran, mana aha xaqiiqa fikira oo keliya.

▣ **“Ciise Masiix, kii aad soo dirtay.”** Adkaynta Ciise inuu Abbuhu soo “diray” ayaa waxay tahay mid aad ugu soo noqnoqonaysa Yooxanaa (3:17, 34; 5:36, 38; 6:29, 38, 57; 7:29; 8:42; 10:36; 11:42; 17:3, 8, 18, 21, 23, 25; 20:21). Rabbaaniyiintu erayga *apostellō* waxay u adeegsan jireen qofka wax metalaya ee dhinac ka socda. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 5:24.

17:4 “Dhulka ayaan kugu ammaanay” eeg fiirada 13:31-32. Erayga “ammaan” waxa loo adeegsan karaa (1) “ammaan siin” ama (2) “muujinta ammaanta.” Aayadda 6 ayaa haddaba waxay sheegaysaa macnaha #2. Ciise muhiimaddiisu waxay ahayd inuu muujiyo Aabbaha (1:14, 18).

▣ **“anoo dhammeeyey shuqulkaad ii dhiibtay”** asalka Giriigga ee *telos* wuxuu faa’idaynayaa macanaha “dhammays tirka” (4:34; 5:36; 19:30). Shuqulka haddaba wuxuu koobsanayay saddex dhinac

1. Muujinta Aabbaha (1:14, 18)
2. Madax furashada aadanaha leexday (Markos 10:45; 2 Korintos 5:21)
3. Tusaalaha aadaninimada runta ah (13:31; 1 Butros 2:2)
4. Sidookale shaqada Ciise ee shafaaca qaadistu way soconaysaa (1 Yooxanaa 2:1; Cibraaniyada 7:25; 9:24).

17:5 “mmaan...ammaantaan” aayaddani waxay adkaynasaa jiritaanka hore ee Masiixa (1:1, 15; 6:62; 8:58; 16:28; 17:11, 13, 24; 2 Korintos 8:9; Filiboy 2:6-11; Kolosay 1:17; Cibraaniyada 1:3; 10:5-8). Ciise ammaanta wuxuu u muujiyay xertiisa isagoo adeegsanaya mucjisooyin (1:14; 2:11; 11:4, 40; 12:28). Ammaanta buuxdana wuxuu ku gaadhayaa dhimashadiisa, sarakicistiisa iyo aaditaankiisa samada (aayadda 24; Filiboy 2:5-6, 17). Falkanna waxa loo adeegsaday iyadoo Aabbaha wax laga dalbanayo. Eeg fiirada ku saabsan “ammaanta” ee 1:14.

NASB (UPDATED) TEXT: 17:6-19

⁶Magacaagaan u muujiyey dadkii aad dunida iga siisay. Kuwaagii bay ahaayeen. oo anaad i siisay, iyaguna hadalkaagay xajiyeen. ⁷Hadda waxay garanayaan wax kastoo aad i siisayba inay xaggaaga ka yimaadeen. ⁸Waayo, erayadaad i siisay ayaan siiyey iyaga. wayna aqbaleen. run ahaan bayna u garteen inaan kaa imid. wayna rumaysteen inaad i soo dirtay. ⁹Iyaga waan kuu baryayaa; kuu baryi maayo dunida laakiin waxaan kuu baryayaa kuwaad i siisay, waayo, waa kuwaagii. ¹⁰Waxayga oo dhan adaa leh, waxaagana anaa leh, iyagana waan ku ammaanmay. ¹¹Anigu dunida sii joogi maayo: kuwanuse duniday joogayaan, aniguna waan kuu imanayaa. Aabbe Qoduusow, iyaga ku hay magacaagii aad i siisay, inay mid ahaadaan sideenna oo kale. ¹²Intaan iyaga la jiray waxaan iyaga ku hayay magacaagii aad i siisay. waanan ilaaliyey. midkoodna ma lumin. wiilka halaagga maahee, in Qorniinku ahaado. ¹³Haddana waan kuu imanayaa, oo waxyaalahan ayaan ku hadlayaa intaan dunida joogo inay haystaan farxaddayda oo ay ka buuxsanto iyaga. ¹⁴Hadalkaagii ayaan siiyey, oo dunidu waa nebcaatay, waayo, iyagii kuwa dunida ma aha, sidaanan kan dunida u ahayn. ¹⁵Kaa baryi maayo inaad iyaga dunida ka qaaddid, waxaanse kaa baryayaa inaad ka dhawrtid kan sharka leh. ¹⁶Iyagu kuwa dunida ma aha, sidaanan kan dunida u ahayn. ¹⁷Iyaga qoduus kaga dhig runta, hadalkaagu waa run e. **18** Sidaad dunida iigu soo dirtay ayaan anna iyaga dunida ugu diray. **19** Oo aawadood ayaan qoduus iskaga dhigaa, in iyagana xagga runta qoduus lagaga dhigo.

17:6 “Magacaagaan u muujiyey” magacyada Cibraaniga ah ujeedadoodu waxay ahayd inay ka tarjumaan qofka sita magaca (aayadaha 11, 12, 25-26; Sabuurka 9:10). Aayaddani haddaba waxay adkaynaysaa fiqi ahaan qofka arkay Ciise inuu arkay Ilaah (Yooxanaa 1:18; 12:45; 14:8-11; Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:3).

Magacu door fiqi ahaaneed oo muhiima ayuu ka ciyaarayaa waxyaalihii ku sugnaa wada sheekaysigii (14:13, 14, 26; 15:16, 21; 16:23, 24, 26; 17:6, 11, 12, 26). Cutubka 17 waxa lagu isticmaalay labo magac oo Ilaah u gaar ah.

1. Aabbaha Quduuska ah, aayadda 11
2. Aabbaha Xaqa ah, aayadda 25.

▣ **“dadkii aad dunida iga siisay”** middani fiqi ahaan waxay tusinaysaa doorashada (aayadaha 2, 9, 24; 6:37, 39). Qofna ma iman karo ilaa

1. Ilaah uu siiyo
2. Ruuxu u muujiyo (6:44, 65)
3. Ay aqbalaan (1:12); rumaystaan (3:16)

▣ **“hadalkaagay xajiyeen”** addeecitaanku aadbuu muhiim u yahay (8:51, 55; 14:23; 15:10, 20). Waxa loo adeegsaday si lamida Axdiga Hore dhexdiisa “canaan la’aan” (Nuux, Bilwogii 6:9; Ibraahim, Bilwogii 17:1; Israa’iil, Sharciga Kunoqoshadiisa 18:13; Ayuub, Ayuub 1:1). Ujeedaduna maaha addeecitaanka buuxa ama denbi la’aanta, laakiin waa doonista dhegaysiga iyo ku camal falista waxa Ilaah muujinayo. Macnaha halkana waxa ay tusinaysaa rumaysadkii xertu rumaysnayeen Ciise iyo inay isaga ku dhex jireen isla markaana isu jeclaayeen sidii iyagaba Ciise u jeclaaday.

17:7 “waxay garanayaan” waa fal ebyan oo ku dhisan garasho waxaana la socda “in” (*hoti*), oo tusinaya waxa farriintu koobsanayso. Wax ku saabsan adeegsiga Yooxanaa ee “*hoti*” ka eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23, #4.

▣ **“wax kastoo aad i siisayba inay xaggaaga ka yimaadeen”** Ciise waxa uu ku hadlay wixii Aabbuhu u muujiyay ee uu siiyay (aayadda 8; 7:16; 12:48-49).

17:8 “wayna aqbaleen” waxay aqbaleen farriinta Ciise ee Ilaah ka timid. Aayaddu haddaba ma tilmaamayso cidda falku sida tooska ah ugu dhacay. Falku cidda uu ku dhacayaa wuxuu ku sugan yahay 1:12 waana Ciise laftiisa, laakiin halkan waxa weeyi farriinta Ilaah ee Ciise uu la yimid (aayadda 4). Waxa ay middani haddaba tusinaysaa labada dhinac ee asaasiga u ah Injiilka (1) shakhsiga iyo (2) farriinta.

▣ **“aqbaleen...rumaysteen”** waa fal tegay oo tusmayn xambaarsan. Xaqiiqooyinkani waxay tusinayaan Ciise farriintiisa iyo asalkiisa Ilaahiga ah (5:19; 6:68-69; 12:48-49; 16:30; 17:18, 21, 23, 25).

17:9 “Iyaga waan kuu baryayaa” Ciise waa dhexdhexaadiyaha (1 Timoteyos 2:5; Cibraaniyada 8:6; 9:15; 12:24) iyo shafeecay qaadaha (1 Yooxanaa 2:1). Aabbuhuna sidoo kale shaqadan wuu ka qayb qaadanaya (16:26-27), sidoo kalena Ruuxa (Rooma 8:26-27). Badbaadada waxa ka qayb qaadanaya saddex dhinac ee Saddexmidnimada.

▣ **“dunida”** Yooxanaa erayga *Kosmos* sideed iyo toban jeer ayuu ku dhex adeegsaday cutubkan. Ciise wuxuu daryeela (1) dhulka (17:5, 24) iyo (2) sida rumaystayaashu xidhiidhka ulala leeyihiin leexashadiisa (1:10; 17:6, 9, 11, 13, 14, 15, 17, 18, 21, 23). Qoraallada Yooxanaa waxa loogala jeedaa “aadanaha ka geesta ah Ilaah.” waxaanu macneheedu koobsan karaa (1) dhulka; (2) dhammaanba nolosha dunida korkeeda; ama (3) nolosha ka soocan Ilaah. eeg Mawduuca Gaarka ah 14:17.

17:10 “Waxayga oo dhan adaa leh, waxaagana anaa leh” middani waxay tusinaysaa midnimada Saddexmidnimada (aayadaha 11, 21-23; 16:15). Wax ku saabsan Saddexmidnimada ka eeg Mawduuca Gaarka ah 14:26.

▣ **“iyagana waan ku ammaanmay”** waa fal tegay oo qarsoon ahna tusmayn. Waxa lagama maarmaan ah in xertu ammaanaan Ciise sida Aabbuhuba isaga u ammaanay, waana masuuliyad wayn!

17:11 “Anigu dunida sii joogi maayo” hadalkani waxa uu tilmaamayaa (1) mustaqbalka dhow marka Ciise u tegi doono Aabbaha (Falimaha Rasuullada 1:9-10) ama (2) adeegga Ciise ee jamaaciga ah.

▣ **“Aabbe Qoduusow”** Axdiga Cusub dhexdiisa in badan Ilaah looguma adeegsado “quduus” sida Axdiga Hore oo kale, halkan oo keliya ayaana lagu adeegsaday (ka Quduuska ah, 1 Butros 1:16). Hadiyo goor quduusnaantu (*hagios*) waxa la xidhiidhaa Ruuxa (1:33; 14:26; 20:22), iyadoo erayga Giriigga ahna sidoo kale lagu adeegsaday aayadda 17 (*hagiasmos*) iyo Ciise sida ku sugan aayadda 19 (*hagiazō*).

Macnaha luqo ahaaneed wuxuu faa’idaynayaa “soocnaan,” (aayadaha 17, 19) waxaana loo adeegsaday shakhsiyaadka ama meelaha iyo waxyaalaha Ilaah loo gaar yeelay, sidookalena waxay sifaynaysaa ama tilmaamaysaa dabeecadda Ilaah (Ka Quduuska ah ee Israa’iil), waxaamay ka soocaysaa waxyaabaha maaddiga ah iyo dunida leexatay. Ciise waa quduus, kuwa isaga raacana waxa laga rabaa inay raacaan jidka quduusnaanta. Rumaystayaasha waxay qoduusiin ku yihiin Masiixa dhexdiisa, laakiinse waa inay quduusnaanta ku muujiyaan nolol maalmeedkooda iyagu ku dayanaya Masiixa.

MAWDUUC GAAR AH: QUDDUUS

I. Axdiga Hore Adeegsigiisii

- A. Isku keenidda ereyga (*kadosh*) ma cadda, laga yaabee Kancaaniyiintii. Waa macquul in qayb xididka ereyga ka mid ah ee (i.e., *kd*) uu macnaheedu yahay “in la qaybiyo.” Tan ayaa ah qeexidda caankaah “ka soocan ama laga saaray (dhaqanka Kancaaniyiinta, cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 7:6; 14:2,21; 26:19) sidii Ilaah u adeegsan lahaa.”
- B. Waxa uu ereygu la xidhiidhaa waxyaabo bidco ah, meel, waqti, ama shaqsiyo. Kitaabka Bilowgii dhexdiisa laguma isticmaalin, waxa uu caadi ku noqday Baxniintii, Laawiyiintii, iyo Tirintii.
- C. Sida ku jirta qoraalladii wax sii sheegidda ahaa ee nebiyda (gaar ahaan. Ishacyaah iyo Hoosheeca) shayga gaarka ah ayaa horraanta laogu soo bandhigayaa, laakiin looma xoojin in uu horay imanayo. Waxa uu ahaa qaab lagu caddaynayo jiritaanka Ilaah (Ishacyaah 6:3). Ilaah waa qudduus magaca u taagan dabeecaddiisana waa qudduus. Dadkiisa ay tahay in ay dabeecaddiisa u muujiyaan adduunka baahanna waa qudduus (haddii ay axdiga rumaysad ku addeecaan).
- D. Ilaah naxariistiisa iyo jacaylkiisu waa kuwo aan laga sooci Karin ujeedooyinka fiqi ahaneed ee axdiyada, caddaaladda, dabeecadda lama huraanka ah. Tan halkan ku jirta ayaa waxa ay tahay arrinka Ilaah ee ku aaddan aadanahan fallaagoobay, dhacay ee aan qudduuskaahayn. Qodob aad u xiiso badan ayaa waxa uu ku jiraa Robert B. Girdlestone, *synonyms of the Old Testament*, bogagga 112-113.

II. Axdiga Cusub

- A. Qoraayaasha Axdiga Cusub waa wada Cibraaniyiin (marka Luukos laga reebo), laakiin waxaa saameeyay qoraalladii Giriigta (i.e Septuagint). Waa tarjumaadaha Giriigga ee Axdigii Hore kan kan xadaynaya, laakiin ma aha Giriigga caadiga, manhajkooda, fakarkooda, iyo doontooda.
- B. Ciise waa qudduus, waayo Waa Kii Ilaah oo waa Ilaah oo kale (cf. Luukos 1:35; 4:34; Falimaha Rasuullada 3:14; 4:27,30). Waa kan qudduuska iyo xaqa ah (cf. Falimaha Rasuullada 3:14; 22:14). Ciise waa qudduus waayo waa dembi la’aan (cf. Yooxahaa 8:46; II Korintos 5:21; I Tesaloniika; Cibraaniyada 4:15; 7:26; I Butros 1:19; 2:22; I Yooxanaa 3:5).
- C. Waayo Ilaah waa qudduus, carruurtiisuna waa in ay qudduus noqdaan. (cf. Laawiyiintii 11:44-45; 19:2; 20:7,26; Matayos 5:48; I Butros 1:16). Waayo Ciise waa qudduus kuwa isaga raacsanna waa in ay qudduus noqdaan (cf. Rooma 8:28-29; II Korintos 3:18; Galatiya 4:19; Efesos 1:4; I Tesaloniika 3:13; 4:3; I Butros 1:15). Waxaa Masiixiyiinta loo badbaadinayaa in ay ekaanta Masiixa ku adeegaan.

▣ **“iyaga ku hay magacaagii”** Ciise iyaga wuxuu ugu tukanayaa (fal tegay oo amar ah) inay ku helaan xoogganaanta dhowritaanka iyo joogitaanka YHWH isaga uu siiyay (fal ebyan oo tusmayn ah) in xertiisa la siiyo (aayadda 12). Tanina waxay iyaga u suurto gelinaysaa inay dunida leexatay u adeegaan sida isaguba dunida leexatay uu ugu adeegay (aayadda 18). Middani waxa weeyi mid ka mida faa’idooyinka midnimada (aayadda 21) ee u dhexaysa

1. Aabbaha
2. Wiilka

3. Xerta

▣ **“inay mid ahaadaan sideenna oo kale.”** Waa fal tegay oo nisbeyn ah tilmaamayana xidhiidhka iyo midnimada ka dhexaysa Ilaah Saddexmidnimada ah (aayadaha 21, 22, 23; 10:30; 14:10). Waa masuuliyad wayn oo maanta inagu aan u baahi qabno (Efesos 4:1-6). Midnimadu waa midda dib u midayn karta kaniisadda Ilaah ee la kala qaybiyay.

17:12 “ku hayay...ilaaliyay” falka hore waa midaan buuxin ka labaadna waa fal tegay, macnohooduna waa isku mid. Ciise waxa uu adkaynayaa ilaalintiisa daa’imiska ah ee uu dhowrayo rumaystayaasha (1 Butros 1:3-9).

Kitaabkiisa *Word Studies in the New Testament*, Vol 1, ayuu M. R. Vincent ku caddaynayaa farqiga u dhexeeya labadan ficil, waxaanu u arkaa in ficilka hore (*tereo*) inuu tusinayo ilaalin, halka ficilka labaadna (*phulassō*) uu ka tusinayo gaadh ka hayn (p.496).

▣ **“midkoodna ma lumin”** hadalkani wuxuu muujinayaa awoodda Ciise ee ilaalinta ah (6:37, 39; 10:28-29). Waxa adag tarjumaadda erayga *“apollumi”* sababtuna waa iyadoo loo adeegsado labo macne oo kala duwan. Kitaabkiisa *Theological Dictionary of the New Testament*, Vol. 1, ayuu Gerhard Kittel ku leeyahay “Guud ahaan waxaan odhan karnaa waxyaalaha hoos ku qoran 2 iyo 4 waxay la xidhiidhaan dunidan sida Injiillada kale dhigayaan, halka 1 iyo 3 ay kala xidhiidhaan dunida danbe, sida Bawlos iyo Yooxanaa dhigayaan” p.394. macnayaasha uu bixinayaa waa:

1. “baabi’iin ama dilis”
2. “lumitaan ama ka cabashada lumista”
3. “halaagsamid”
4. “lumis”

Hadiyo goor eraygan waxa loo adeegsadaa baaba’a ama joogi la’aanta kuwa aan badbaadin xukunka dabadiis. Laakiinse waxay u muuqataa in fahankani uu khilaafayo Daanyeel 12:2. Sidoo kalena wuxuu ka maqan yahay farqiga u dhexeeya macnayaasha isla xidhiidha ee Injiillada kale iyo qoraallada Yooxanaa iyo Bawlos, oo maldah ahaan loogu adeegsanayo tilmaamista lumitaaanka ruux ahaaneed, iyadoon ahayn halaagga caadiga ah. eeg Mawduuca Gaarka ah 10:10.

▣ **“wiilka halaagga maahee”** waxa muuqata inay tani ka hadlayso Yuudas Iskariyod. Ereyadana waxa lagu adeegsaday 2 Tesaloniika 2:3 “Ninka Denbiga.” Waa erayo Cibraaniga ku samaynaya macnaha “ka loo qadaray lumitanka.” Waxay la mid tahay “lumis” ta lagu adeegsaday aayadda: “cidinina ma lumin marka laga reebo kii loo qadaray inuu lumo.” Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:64.

▣ **“in Qorniinku ahaado”** waxay middani u noqonaysaa Sabuurka 41:9, waxaana lagusoo xigtay Yooxanaa 13:18; 6:70-71.

7:13 “Haddana waan kuu imanayaa,” waxay middani tilmaami kartaa

1. Tukashada Ciise (Yooxanaa 17)
2. Tegitaanka Ciise ee xagga samada (aayadda 11; Falimaha Rasuullada 1)

▣ **“waxyaalahan ayaan ku hadlayaa intaan dunida joogo”** erayadani waxay dib uula xidhiidhi karaan

1. 11:42, Ciise oo kor u hadlayay si loo maqlo
2. 15:11, Ciise ereyadiisa oo si toosa ula xidhiidha xerta “ farxaddooda”

▣ **“inay haystaan farxaddayda oo ay ka buuxsanto iyaga”** waa fal tegay oo ku dhisan garasho. Waa ballan qaad cajiib leh (15:11; 16:24). Yooxanaa markale ayuu adeegsanayaa ereyadan (1 Yooxanaa 1:4; 2 Yooxanaa 12).

17:14 “Hadalkaagii ayaan siiyey” eraygaha ah “hadal” waa *logos*, erayga Giriigga ah ee *rhēma* oo u dhigmana waxa lagu adeegsaday aayadda 8. Waa adkayn ama xoojin ah in is miijinta Ilaah ay ku timid shaqsiyadda Ciise iyo waxbaristiisa iyo tusaalaha noloshiisa. Ciise isagoo hadalka, ayuu hadalka bixiyaa, shakhsiga iyo hadalkuna way wada socdaan. Waxaan aqbalaynaa shakhsiga Injiilka sidoo kalena waxaan rumaynaynaa farriinta Injiilka!

▣ **“dunidu waa nebcaatay”** necbaanshaha dunidu waa calaamadda aqbalitaanka Masiixa (Yooxanaa 15:18-20; 1 Yooxanaa 3:13).

▣ **“kuwa dunida ma aha”** rumaystayaasha duniday ku dhex noolyihiin laakiin maaha dad adduunyo (aayadda 16; 1 Yooxanaa 2:15-17).

▣ **“sidaan kan dunida u ahayn.”** erayga “duni” waxa ay tilmaamaysaa aadanaha leexday iyo sidoo kale malaa’igaha leexday ee dunidan (8:23). Waana tusaale kale oo ka mida hadallada Yooxanaa caanka ku yahay.

17:15 “Kaa baryi maayo inaad iyaga dunida ka qaaddid” Masiixiyiintu muhiimad ayay dunida ugu dhex sugan yihiin (aayadda 18; Matayos 28:19-20; Luukos 24:47; Falimaha Rasuullada 1:8). Mana aha wakhtigii ay guriga tegi lahaayeen!

▣

NASB, NKJV **“kan sharka leh”**

NRSV **“kan sharka leh”**

TEV, NJB **“Kan Sharka leh”**

Eraygan asalkiisu wuxuu tilmaamayaa laba ama dheddig. Ka hadalka sharku marar badan ayuu kusoo aroorayaa qaybtan ka midka ah Injiilka Yooxanaa (12:31; 13:27; 14:30; 16:11), sidaasi darteedna eraygan tarjumaaddiisu waxay noqonaysaa sida ku sugan Matayos 5:5, 37; 6:13; 13:19, 38, waana “shar fale” (2 Tesaloniika 3:3; 1 Yooxanaa 2:13-14; 3:12; 5:18-19). Eeg Mawduuca Gaarka ah 12:31.

▣ **“goduus kaga dhig”** waa fal amar ah oo ku dhisan garasho asalkiisuna yahay (*hagios*). Rumaystayaasha waxa laga rabaa

1. Inay ku daydaan Masiixa (aayadda 19; Rooma 24; Galatiya 4:19; Efesos 1:4; 1 Tesaloniika 5:23). Tanina waxay ku suurtoobi kartaa oo keliya garashada runta, waana erayga nool (Ciise, 10:36) iyo ka qoran (Kitaabka, 15:3).
2. “quduusnaan” tu macnaha ay ku samaynaso Axdiga Hore waa “u heellanaanta adeegga Ilaah.” aayadda 18 ayaana caddaynaysa ujeedada laga leeyahay “quduusnaanta.”

Su’aashu maaha haddii #1 ama #2 labaduba ay run yihiin. Labaduba waa run. Ciise noloshiisuna waxay tuisay labadaba (aayadda 19). Waxa suurto gal ah in Yooxanaa uu haystay “quduus ka dhigista” xerta oo ahayd adeeg u dhigma wadaaddada Axdiga Hore sidii ugu diyaar garoobi jireen adeegga Ilaah. wadaaddadu dhexdhexaadiyaal ayay ka ahaayeen Axdiga Hore gaar ahaan qurbaanka, laakiin xertu waxay u adeegeen iyaga oo muujinaya qurbaanka dhammayska tiran ee Masiixu ku sameeyay Axdiga Cusub (eeg kitaabka Cibraaniyada oo is barbar dhig ku samaynaya Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub).

▣ **“runta, hadalkaagu waa run e”** runtuna waxa ay tilmaamaysaa farriinta Masiixa ee ka socota Ilaah (8:31-32). Ciise waxa uu ku baaqay farriinta dhammayska tiran (*Logos*, 1:1, 14) iyo runta (14:6) Ilaah. hadiyo goorna Ruuxa Quduuska ah ayaa lagu sheegay Ruuxa Runta (14:17; 15:26; 16:13). U fiirso iyadoo rumaystayaasha quduus lagaga dhigay runta (aayadda 19 magaca fal sameeyaha ebyan) iyo sidoo kale Ruuxa (1 Butros 1:2). Wax ku saabsan runta ka eeg Mawduucyada Gaarka ah 6:55 iyo 17:3.

Waxa suurto gala in “hadalkaagu waa run” ay tahay hadal maldahan ama xigasho ka ahaatay LXX ka Sabuurka 118:142, “xaqnimadaadu waa weligeed, sharciguna waa run.” Waxa laga yaabaa in Ciise loo arkay

1. Muusaha cusub (Sharciga Kunoqoshadiisa 18:15)
2. Xertoosa oo wadaaddo cusub ah
3. Noloshiisa oo ahayd muujinta dhabta ah ee Ilaah runta ah
4. Midnimada Saddexmidnimada iyadoo xertu buuxiyeen ujeedada abuuritaanka (Bilowgii 1:26-27)
5. Ciise oo ah dhammays tirka Bilowgii 3:15

17:18 “Sidaad dunida iigu soo dirtay” Ciise noloshiisu waxay ahayd addeecitaa ilaa dhimashadii (2 Korintos 5:14-15; Galatiya 2:20; 1 Yooxanaa 3:16), iyadoo tusaalena u ahayd kuwa isaga raacay (aayadda 19). Waxaanu iyaga u dirayaa sidii Aabbuhu ugu diray caalam halaagsamay 20:21. Waxa iyaga markaa laga rabaa inay dunida waajahaan oonay ka cararin. Eeg Mawduuca Gaarka (*Apostellō*) ah 5:24.

17:19 “qoduus iskaga dhigaa” waxa middani ay tilmaamaysaa Golgotta! Ciise wuxuu qabsanayay doonista Aabbaha (Markos 10:45).

▣ **“in iyagana xagga runta qoduus lagaga dhigo.”** Erayadan oo ah *hina* waxa ay faa’idaynasaa kasitaan waxaana la socda fal sameeyaha ebyanka ah, ee tilmaamaya xaqiijinta natiijoyinka iyo sii socoshadooda. Si kastaba ha ahaatee waxa jirta arrin ku dhisan

1. Adeegga Masiixa ee isku tallaabta korkeeda, sarakicista, iyo kor aadista
 2. Ka jawaab celinta towbad keenka iyo rumaysadka joogtada ah ee waxbarista Ciise.
- Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55 iyo 17:3

NASB (UPDATED) TEXT: 17:20-24

²⁰Kuwan oo keliya kuu baryi maayo, waxaanse weliba kuu baryayaa kuwa igu rumaysanaya hadalkooda aawadiis, ²¹inay dhammaan mid ahaadaan, sidaad adigu, Aabbow, iigu jirtid. aniguna aan kuugu jiro. inay iyaguna inoogu jiraan, in dunidu rumaysato inaad i soo dirtay. ²²Oo ammaantaad i siisay iyagaan siiyey, inay mid ahaadaan sidaynu mid u nahay. ²³Iyagaan ku jiraa, adna anigaad igu jirtaa, inay mid ku dhan yihiin, in dunidu garato inaad i soo dirtay, iyo inaad iyaga u jeclaatay sidaad ii jeclaatay. ²⁴Aabbow, kuwaad i siisay waan doonayaa inay ila joogaan meeshaan joogo inay arkaan ammaantaydil aad i siisay, waayo. adaa i jeclaa intaan dunida la aasaasin.

17:20 “kuwa igu rumaysanaya hadalkooda aawadiis” waa fal tegay oo ku shaqaynaya mustaqbal, waxaanu tilmaamayaa rumaystayaasha iman doona oo hdan sida ku sugan 10:16, oo dhammaan dunidoo dhan ah. eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23.

▣ **“hadalkooda aawadiis, ”** waa erayga *logos*. Maadaama oo lgu aadeegsaday aayadda 14 iyo iyadoo la mida *rhēma* da lagu aadeegsaday aayadda 8, waxa ay tusinaysaa muhiimadda xerta loogu gudbinayo muujinta Ilaah ee ku sugnaatay Masiixa.

17:21 “inay dhammaan mid ahaadaan” midowgani maaha mid ka yar midnimada Saddexmidnimada (aayadaha 11, 22, 23; Efesos 4:1-6). Tanina waxa ay ka mid tahay waxbarista Ciise kuwa isaga raacay aanay ku dayanin.

▣ **“in dunidu rumaysato inaad i soo dirtay”** waa fal tegay oo ku dhisan garasho qaabkiisuna nisbeyn yahay. Ujeedada midnimadu waa wacdinta. Aayadda 23 ayaana sidan oo kale adkaynaysa!

Ciise uma tukanayo dunida (aayadda 9) laakiinse kuwa isaga raacay ayuu farriintiisa dunida ugu dirayaa iyadoo nacayb u keeni doonta, waayo Ilaah dunida wuu jecelyahay (aayadaha 21, 23; 3:16). Ilaah waxa uu raba in dunida oo dhammi ay rumaysato (1 Timoteyos 2:4; Tiitos 2:11; 2 Butros 3:9). Ilaah waxa uu jecelyahay dhammaanba kuwa uu ekaanshihiisa ka abuuray, waxaana denbiyadooda u dhinta Ciise. Eeg Mawduuca Gaarka (*Apostellō*) ah 5:24.

17:22 “ammaantaad i siisay iyagaan siiyey” waa laba ficil oo dhammays tiran tusmayna xambaarsan. Aammaantu waxay tusinaysaa farriinta ah muujinta Ilaah. waxay eraygiisa gaadhsiin doonaan duniada sida Ciiseba erayga Aabbaha usoo gaadhsiiyay. A. T. Robertson ayaa kitaabkiisa *Word Pictures in the New Testament*, Vol. V, waxa uu ku leeyahay “Ammaantu waa ammaanta Erayga Jidhka noqday (1:14 iyo 2:11) mana aha ammaanta Erayga Weligiis ah ee lagu sheegay 17:24” (p. 280). Eeg fiirada ku saabsan “ammaanta” ee 1:14.

17:23 “inay mid ku dhan yihiin, ” erayga *hina* oo uu la socdo magaca ficil sameeyuha buuxa sida aayadda 19, laakiinse waxa jirta arrinta ku salaysan (1) shaqada Masiixa ama (2) rumaysad kusii socoshadooda. Rumaystayashu waxay ku midoobeen adeegga Masiixa waana mid jiraysaa! Wacdintana waa ujeedada midowga.

17:24 “ila joogaan” Ciise wuxuu ku laaban doonaa ammaan si uu kuwa isaga raacay meel ugusii diyaariyo (14:1-3). Dunidani maaha guriga aan ku waarayno, sidii aanay Ciiseba ugu ahaanin! Waxaana iman doonta maalintaa makhluuqaadku (Bilowgii 1-2) dib ugu laaban doonaan Isaga (Muujintii 21-22).

▣ **“inay arkaan ammaantaydii aad i siisay”** erayga “ammaan” ee halkani lama mid aha sida aayadda 22. Halkan waxay ku tusinaysaa weynida Ilaahnimada Ciise intii aanu soo qaadan jidhka ka hor.

▣ **“intaan dunida la aasaasin”** Ilaaha Saddexmidnimadu wuxuu ka shaqaynayay badbaadaba abuurka xitaa bilowgii ka hor. Erayadanna marar badan ayaa lagu dhex adeegsaday Axdiga Cusub (Matayos 25:34; Luukos 11:50; Efesos 1:4; Cibraaniyada 4:3; 9:26; 1 Butros 1:20; Muujintii 13:8; 17:8).

NASB (UPDATED) TEXT: 17:25-26

²⁵Aabbaha xaqa ahow. dunidu kuma ay garanaynin. Laakiinse waan ku garanayay: kuwanna waxay garanayeen inaad i soo dirtay. ²⁶Magacaagaan iyagii garansiyeey, waanan garansiin doonaa, in jacaylkii aad i jeclayd uu ku jiro iyaga, anna aan iyaga ku jiro.

17:25 “Aabbaha xaqa ahow” magacani waxa uu u dhigmaa midka kusoo arooray aayadda 11 “Aabbe Quduusow.” Erayga “xaq” asalkiisa Cibraaniguna waxuu tilmaamayaa “qalabka qiyaasta.” Ilaah waa qiyaasaha xukunka. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 2:29.

▣ **“dunidu kuma ay garanaynin”** dunida ama aadanuhu waxay u shaqaynayaan si ka gees ah Ilaah manyar garanaynin Ilaah (17:25) ama Wiilka (1:10). Waa duni shar miidhan ah (3:19-20; 7:7).

▣ **“Laakiinse waan ku garanayay”** Ciise waa meesha ugu nadiifsan ee ugu saraysa garashada Ilaah (1:18; 3:11).

17:26 “Magacaagaan iyagii garansiyeey” tani waxay tusinaysaa in Ciise uu muujiyay shakhsiyadda Ilaah iyo qorshaha ku waajahan badbaadada aadanaha (aayadaha 6, 11, 12; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28). Ereyganna shan jeer ayaa lagu dhex adeegsaday aayadaha 25 iyo 26.

▣ **“waanan garansiin doonaa”** middani waxya sheegaysaa (1) sii socoshada muujinta Ilaah ee ku sugan Ciise iyadoo ku imanaysa Ruuxa Quduuska ah ama (2) dhacdooyinka badbaadada ee soo dhowaanayay. Macnuhu wuxuu tusinayaa #1. Badbaadadu maaha go’aanka ugu horreeya oo keliya, laakiinse waa nolosha sii soconaysaa. Badbaadaduna waxay ku dhammays tirmaysaa sii socoshada xidhiidhka, iyadoo macnaha Cibraaniga ee xidhiidhkuna ka tarjumayo “garashada” shakhsi ahaaneed.

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay tahay muhiimadda salaaddu dhinaca fiqi ahaaneed?
2. Yuudas ma wuxuu ahaa rumayste nimcada ka dhacay?
3. Waa maxay muhiimadda midnimadu?
4. Jiritaankii hore ee Ciise muxuu muhiim u yahay?
5. Qeexitaan ku samee erayada macnaha furaha u ah:
 - a. “ammaanid”
 - b. “siin”
 - c. “garasho”
 - d. “diris”
 - e. “magac”
 - f. “duni”

YOOXANAA 18

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ^d	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Gacangelintii iyo xidhistii Ciise	Gacangelintii iyo xidhistii Getsamane	Xidhistii, maxkamadayntii, qodbitaankii Ciise (18:1-19:42)	Xidhitaankii Ciise	Xidhitaankii Ciise
18:1-11	18:1-11	18:1-11	18:1-4 18:5a 18:5b 18:5c-7a 18:7b 18:8-9 18:10-11	18:1-9 18:10-11
Ciise oo horjooga wadaadkii ugu sarreeyay	Wadaadkii ugu sarreeyay hortiisa		Ciise oo horjooga Annas	Ciise oo horjooga Annas iyo Kayfas, Butrosna wuu dafiray isaga
18:12-14	18:12-14	18:12-14	18:12-14	18:12-14
Butros oo Ciise dafiray	Butros wuxuu dafiray Ciise		Butros wuxuu dafiray Ciise	
18:15-18	18:15-18	18:15-18	18:15-17a 18:17b 18:18	18:15-18
Wadaadkii u sarreeyay oo Ciise wax su'aalay	Ciise waxa su'aalo waydiiyay wadaadkii ugu sarreeyay		Wadaadkii u sarreeyay oo Ciise su'aalo waydiiyay	
18:19-24	18:19-24	18:19-24	18:19-21 18:22 18:23 18:24	18:19-24
Butros oo Ciise markale dafiray	Butros oo labo jeer dafiray Ciise		Butros markaluu Ciise dafiray	
18:25-27	18:25-27	18:25-27	18:25a 18:25b	
Ciise oo Bilatos hor jooga	Maxkamaddii Bilatos		18:26 18:27	
18:28-38a			Ciise oo Bilatos hor joogo	Ciise oo Bilatos hor jooga

18:28-38	18:28-32	18:28-29	18:28-32
		18:30	
		18:31a	
		18:31b-32	
	18:33-38a	18:33	18:33-19:3
		18:34	
		18:35	
Ciise waxa lagu xukumay dhimasho (18:38b-19:16c)		18:36	
		18:37a	
18:38b-19:7	18:38b-19:7	18:38b	
		18:38a	
	Qaadashadii meesha Baraabbas		
	18:39-40		

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 18:1-40

- A. Yooxanaa waxa uu ka tegayaa silicii Ciise ee Getsamane dhexdeeda, waxaana laga yaabaa sababtu inay tahay isaga oo hubay Ciise oo wax walba gacanta ku haya, oo isaga laftiisa ayaa Ciise hoos u dhigay (10:11, 15, 17, 18).
- B. Habaynta dhacdooyinka cutubkani waxa ay ka duwan yihiin Injiillada kale, waxaana laga yaabaa taasi inay u noqonayso
 1. Dabiicadda diiwaan gelinta markhaatiga goob jooga ah
 2. Ujeedooyinka qoraaga ee fiqi ahaaneed. Qorayaasha Injiilku waxa ay haysteen xorriyadda ay u habaynayeen erayada Ciise

- C. Injiilka Yooxanaa waxa uu aad uga duwan yahay Injiillada kale, sidaasi darteedna marjic wanaagsan waxa loogu noon karaa kitaabka Gordon Fee, Douglas Stuart, ee *How To Read the Bible For All Its Worth*, halkaasoo uu ku bixinayo aragtiyo dhowr ah. Qoraayada Injiilku iyaga oo waxyigu hagayo waxay haysteen xorriyadda
1. Ka doorashada
 2. La dhaqmista
 3. Dib u habaynta

Ereyadii Ciise iyo shaqadii Ciise. Uma malaynayo inay samayn karayeen erayada iyo shaqooyinka, laakiinse waxa ay ku salaynayaan qaabka wacdintooda ay uga socdaan, iyagoo rabay inay dadka u muujiyaan Ciise. Xasusnow Injiilladu in aanay ahayn taariikh reer galbeed, laakiin waa taariikh reer bari. Maaha taariikh shakhsi ahaaneed laakiinse waa qorallo ujeedadoodu tahay wacdin.

D. Kitaab marjic ah oo cutubkan ku saabsan waa maxkamadayntii Ciise ee (Sanhedrin), ayaa waxa uu yahay A. N. Sherwin White kitaabkiisa *Roman Society and Roman Law in the NT*.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 18:1-11

¹Ciise markuu waxyaalahaas yidhi wuu la baxay xertiisii oo kala gudbay Tog Qidroon, meeshay ku tiil beer uu galay, isaga iyo xertiisiiba. ²Yuudasna, kii gacan geliyey, meeshaas wuu garanayay, waayo, Ciise marar badan ayuu meeshaas xertiisii la tegi jiray. ³Haddaba Yuudas isagoo askar iyo saraakiil ka wada wadaaddadii sare iyo Farrisiintii ayuu meeshaas la yimid laambado iyo siraaddo iyo hub. ⁴Sidaa daraaddeed Ciise isagoo og waxa ku dhici doona oo dhan ayuu baxay oo ku yidhi iyaga, Kumaad doondoonaaysaan? ⁵Waxay ugu jawaabeen, Ciisihii reer Naasaret. Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Isagii baan ahay. Waxaana iyaga la taagnaa Yuudas kii gacan geliyey. ⁶Sidaa daraaddeed Ciise markuu ku yidhi, Isagii baan ahay, dib bay u socdeen, oo dhulkay ku dhaceen. ⁷Mar kale haddaba ayuu weydiiyey, oo ku yidhi, Kumaad doondoonaaysaan? Oo waxay ku yidhaahdeen, Ciisihii reer Naasaret. ⁸Ciise ayaa ugu jawaabay, Waan idiin sheegay inaan isagii ahay. Haddaba haddaad i doonaysaan, kuwan iska daaya, ha tageene. ⁹Wuxuu saas u yidhi inuu dhammaado hadalkii uu ku hadlay oo ahaa, Kuwii aad i siisay, midkoodna ma lumin. ¹⁰Simoon Butros haddaba, isagoo seef haysta, ayuu soo bixiyey, oo wuxuu ku dhuftay wadaadka sare addoonkiisii, oo ka gooyay dhegta midigta. Addoonkii magiciisu wuxuu ahaa Malkos. ¹¹Sidaa daraaddeed Ciise wuxuu Butros ku yidhi, Seefta galkeeda ku celi. Koobka Aabbuhu i siiyey miyaanaan cabbayn?

18:1 “Tog Qidroon” erayga ah “Qidroon” waxa macnihiisu noqon karaa (1) ka ahaaday bariis ama (2) madow. Haddaba, toggani waxa uu ku kala dhexyaallaa Buur Moriyah iyo Buur Saytuun (LXX II Samuu’eel 15:23; 2 Boqorradii 23:4, 6, 12; 2 Korintos 15:16; 29:16; 30:14; Yeremyaah 31:40). Toggan biyuhu waxa ay mari jireen wakhtiga jiilaalka isagoo xagaagana engayg ahaan jiray, waxaanu ahaa meesha lagu safayn jiray dhiigga waxyaalaha la qalo, oo waxa dhici karta in ay ahayd sababta loogu bixiyay “madow.” Waxa jira haddaba khilaaf u dhexeeya qoraal gacmeedyada Giriigga:

1. “Bariiska” (*kedrōn*) sida ku sugan MSS κ^c , B, C, L iyo kuwo kale
2. “Bariisa” (*kerou*) sida ku sugan MSS a^* , D, iyo W
3. “Kidron” (*kedrōn*) MSS A iyo S

United Bible Society daabacaadda afraad ayaa adeegsanaya #3

▣ **“beer”** cutubkani waxa uu ka tegayaa silcintii Ciise laakiin waxa uu qorayaa in Ciise beer lagu dhex qabtay. Meeshani haddaba waxa ay ahayd goobta uu Ciise ku nasan jiray (aayadda 2; Luukos 22:39) waxaanay u muuqataa in Ciise uu halkan seexan jiray usbuucii ugu dambaysay noloshiisa (Luukos 21:37). Beeraha waxa iska lahaa hantiilayaasha waxaanay ku yaalleen magaalada dibaddeeda Buur Saytuun korkeeda, oo waxa lagu rabbayn jirayn xayawaanka nijaasta lagasoo qaadi jiray.

18:2 waa faallo kale oo Yooxanaa bixinayo.

▣ **“Yuudas”** Waxa jira waxyaalo badan oo la odhan Yuudas way ku kallifeen gacan gelinta Ciise, marar badan ayaana Yuudas lagu dhex sheegay injiilka Yooxanaa (6:70-71; 12:4; 13:2, 26, 39; 18:2, 3, 5). Riwaayadda cusub ee Jesus Christ Superstar ayaa Yuudas waxa ay ku tilmaamaysaa nin aamin ah, laakiinse walaacsan oo raba inuu Ciise ku kallifo inuu is sheego isaga oo ah Masiixa, si uu uga guulaysto gumaystayaashii Roomaanka oo uu u xoreeyo Yerusaalem. Laakiinse Yooxanaa waxa uu tilmaamayaa iyada oo Yuudas arrintaas ay ku kalliftay xumaani.

Dhibaataada ugu wayn ee la xidhiidha dhinaca fiqiga ayaa waxay tahay waxyaalaha la xidhiidha maamulka Ilaah iyo xorriyadda aadanaha iyo masuuliyaddooda. Ma Ilaah ama Ciise ayaa ku ciyaarayay Yuudas? Yuudas masuuliyadda miyaa la saarayaa iyada oo shaydaanku uu adeegsaday amaba iyada oo hore loo sii sheegay inuu Ciise gacan gelin doono? kitaabku haddaba su’aalahan si toos ah ugama jawaabay. Ilaah isaga ayaa maamula taariikhda waxaanu garanayaa dhacdooyinka mustaqbalka, laakiinse aadanuhu waxay qaadayaaan masuuliyadda waxa ay doortaan iyo camalladooda. Ilaah waa caadil oo cidna kuma ciyaaro.

Waxa jira kitaab cusub oo isku dayaya inuu difaaco Yuudas, waana *Judas Betrayer or Friend of Jesus?* Waxaana leh William Klassen, Fortress Press, 1996. Laakiinse anigu kuma taageersani waxa ku qoran, maxaa yeelay waxa uu kasoo horjeeda markhaatifurka Yooxanaa ee ku saabsan Yuudas.

MAWDUUC GAAR AH: DOORASHO/ QADARKA IYO BAAHIDA LOO QABO ISU DHEELI TIRKA FIQI AHAANEED

Doorashadu waa mad’han aad cajiib u ah. Arrintu si kastaba ha ahaatee, laakiin ma aha wax la iska samaysan karo ee waa u yeeris in aad noqoto durdur, qalab oo aad kuwa kale madax furasho u noqotid! Axdigii hore ereyga waxaa loo isticmaali jiray marka ugu horraysa adeeg, Axdiga Cusubna waxaa loo isticmaalay marka ugu horraysa badbaadada. Kitaabka Qudduuska ah marna wax is burinaya kam uusam dhigin qorshaha Ilaah iyo doorashada xorta ah ee aadanaha, laakiin wuu xoojiyaa labadaba. Tusaale wanaagsan oo aan qaadan karno oo ku saabsan xiisadda baybalka waxaa ka helaynaa Rooma 9 ee ah Doorashada Ilaaha qaaddir ah iyo Rooma 10 oo ah jawaabta lagama maarmaanka ah ee laga doonayo aadanaha (cf. 10:11, 13).

Furaha xiisaddan barashada Ereyga Ilaah waxaa laga heli karaa Efesos 1:4 Ciise ayaa ah ninka Ilaah u doortay in kuwa kale oo dhan isaga ay doorasho ku helaan. (Karl Barth). Ciise waa “Haada” Ilaah ee baahida aadanihii dhacay (Karl Barth) Efesos 1:4 waxa ay sidoo kale caawinaysa iyaga oo sheegaya in yoolka iyo doorashadii hore aysan ahayn in la galo jannada, laakiin qudduusnimo (U ekaanta Masiixa). Had iyo jeer waxaa na soo jiita faa’iidooyinka ku jira Injiilka masuuliyadha se waannu iska dhego tirnaa! Uyeerista Ilaah (Doorashada) waxay leedahay waqti si la mid ah si nolousha weligeed ah oo kale!

Mad’habuhu waxa ay ku xiriir lala yeesho rumaysadyada kale, ma aha mid keliya, run aan isku xirnayn. Isla socoshada wanaagsan waxa ay tahay in aayadaha laga dhigo in ay yihiin sidii hal xiddig oo kale. Ilaah wuxuu runta u soo diraa bariga, ma aha galbeedka ma aha nooc. Waa in aynaan kala qaadin maxaa yeelay waxay siugu xiran yihiin hab isu sar go’an:

1. Doorashadii hore oo ka soo hor jeedda doorashada xorta ah ee
2. Ammaanka rumaystayaasha oo ka soo hor jeedda u baahnaanta dib u xallinta.
3. Dembigii hore oo ka soo hor jeedda xal u helista dembiga.
4. Dembi la’aanta (kaamilnaanta oo ka soo hor jeedda dembi yaraanta.
5. Bilowga qudduus ka dhigidda, iyo qudduus noqoshada oo ka soo hor jeedda qudduus noqosho horumar leh.
6. Xorriyadda Masiixiga oo ay ka soo hor jeeddo masuuliyadda Masiixiga
7. God’s Transcendence vs. God’s Immanence
8. Ilaah oo aan sinnaba loo ogaan Karin qorshihiiisa dambe oo ka soo hor jeedda sida Ilaah looga ogaan karo qorniinka dhexdiisa
9. Boqortooyada Ilaah oo joogta iyo liddigeeda oo ah kaamilnimada mustaqbalka
10. Tawbadkeenka oo ah hadiyad Ilaah oo ay ka soo hor jeeddo tawbadkeen lagama maarmaan u ah jawaab axdiyeed
11. Ciise oo ah mid Ilaah oo ay liddi ku tahay Ciisde oo Bani aadan ah
12. Ciise wuxuu la mid yahay aabbaha oo ay ka soo hor jeeddo Ciise oo adeege u ah Aabbaha

Barashada tiyooloji ahaaneed ee “axdiga” waxa ay midaynaysaa sarraynta Ilaah (in mar kasta uu leeyahay go’aanka uu doonayo in uu wax ku habeeyo) oo leh bilow la qorsheeyay iyo iyo tawbadkeen cosda, iyo jawaab rumaysad oo ka timaaddo aadanaha. Ka taxaddar in aad hal qayb ka qaadatid qoraalka wada socda oo aad qaybta kalena ka tagtid! Ka taxaddar in aad qaadatid go’aan adiga ku gaar ah oo aad ku tafsiiranaysid mad’habtaaad leedahay ama hab kale oo tiyoojagi!

18:3

NASB “askar Roomaan ah”

NKJV “kooxo ciidan ah”

NRSV “koox askar ah”

TEV “koox askara oo Roomaan ah”

NJB “askar”

Waxa ay tilmaamaysaa koox askar ah oo Roomaan ah oo u dhiganta koox toban ah oo kamida ku dhowaad 600 askari oo xaruntoodu ahayd Antoniyo, oo u dhowayd Macbadka (Falimaha Rasuullada 21:31, 33). Waxa aan suurto gal ahayn Yuudas oo tiradan badan ee askarta ah keenay, waayo Roomaanku waxay diyaar u ahaayeen wakhtiga ciidda wixii mudaharaad ah ee yimaadda inay hor istaagaan, waxaanay askar kasoo gudbiyeen Qaysariya iyagoo Badda kasoo tallaabay. Yuhuuddu waxa ay damceen in Ciise isku tallaabta lagu qodbo laakiin taasi umay suurtoobayn iyadoo Roomaanku gacan kasiyo mooyanee.

▣ “saraakiil ka wada wadaaddadii sare” ilaaliyayaashii Macbadka oo Laawiyiinta ahaa kuwo ka mida ayaa soo raacay askarta Roomaanka. Mar horena waxa ay ku guul darraysteen inay qabtaan Ciise (7:32, 45).

▣ “hub” askarta Roomaanku waxay siteen seefo (6:64; 13:1, 11) ulaha iyo budadkana waxa sitay ilaaliyayaasha Macbadka (Matayos 26:43; Markos 14:43; Luukos 22:52).

18:4 “Ciise isagoo og waxa ku dhici doona oo dhan” waa xoojin ah in Ciise uu waxkasta ogsoonaan oo gacanta uu ku hayay dhacdooyinka xidhiistiisa iyo maxkamadayntiisa (10:11, 15, 17, 18). Ciise isku tallaab ku qodbitaankiisuna muu ahayn wax kedis ah (Markos 10:45; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 14:29). Tani waa ujeedada Yooxanaa ayaa laga yaabaa isaga oon diiwaan gelinayn dhacdooyinkii ka dhacay Getsamane.

16:5

NASB, NJB

“Ciisihii Naasaret”

NKJV, NRSV, TEV

“Ciisihii reer Naasaret”

Eraygani waxa uu shakhsi ahaan sifaynayaa qof Naaseret ka socda. Waxa suurto gala in loogala jeedi karo (1) qof reer Naasiriin ah; (2) Naasaret (Tirintii 6); ama (3) ka socda Naasareet. Adeegsigeeda Axdiga Cusub dhexdiisuna waa #3. Qaar ayaa se la xidhiidhiya xarfo Cibraani ah *nzr* oo ah magac la xidhiidha Masiixa “laan” (nezer, Ishacyaah 11:1; 14:19; 60:21).

MAWDUUC GAAR AH: CIISAHA NAASAREET

Waxaa jira dhawr erey oo kala duwan oo Giriig ah oo lagu isticlaay Axdiga Cusub dhexdiisa si Ciise loogu muujiyo si cad kan uu yahay.

A. Ereyada Axdiga Cusub

1. Naasareet – Magaalada ku taal Galiili (cf. Luukos 1:26; 2:4,39,51; 4:16; falimaha Rasuullada 10:38). Magaaladan laguma sheegin qoraalladii oo dhan laakiin, fariimihii dambe ayaa laga helay.
2. In Ciise uu Naasareet la yimaado wax amaan ah (cf. Yooxanaa 1:46). Calaamadda iskutallaabta Ciise ee ku jirtay meeshan magaceeda ayaa waxa ay calaamad u ahayd nacaybka Yuhuudda.
3. *Nazarenos* - waxay sidoo kale u la xidhiidhtaa booska juquraqafi ahaaneed (cf. Luukos 4:24; 24:19).
4. *Nazoraios* - waxay u taagan tahay magaalo, sidoo kalena waa cayaar ku aaddan sida Cibraaniga uu ku yahay ereyga Masiixi “Laan” (*netzer*, cf. Ishacyaah 4:2; 11:1; 53:2; Yeremyaah 23:5; 33:15; Sakariyaah 3:8; 6:12). Luukos Ciise ayuu midan u adeegsanayaa sida ku jirta 18:37 iyo Falimaha Rasuullada 2:22; 3:6; 4:10; 6:14; 22:8; 24:5; 26:9).
5. La xidhiidha #3 *nazir*, oo macneheedu yahay “mid quduus lagaga dhigay axdi.”

B. Adeegsiyadii taariikh ahaaneed ee ka baxsanaa Axdiga Cusub.

1. Waxay muujinaysaa Yuhuud (ka hor Masiixiyiinta) in ay koox dhaxaltooyo (Aramaatiga *nasorayya*).
2. Waxaa loo adeegsaday goobaha Yuhuudda si loo muujiyo rumaystayaasha ku jira Masiixa (cf. Falimaha Rasuullada 24:5,14; 28:22, *nosri*).
3. Wuxuu noqday ereyga tooska ah ee lagu muujiyo rumaystayaasha sida kaniisadihii Suuriya ee

(Aramygga). “Masiixi” waxaa laga dhex adeegsanayey kaniisadihii Giriigta si loogu yeero rumaystayaasha.

4. Waqti ka mid ah dhiciddii Yerusaaalem, Faarisiintii ayaa waxay dib isugu abaabuleen Jamnia waxayna dejiyeen in uu jiro farqi u dhexeeya sunnaggoogga ito kaniisadda. Tusaale ka mid ah nooca inkaarta looga soo hor jeedo Masiixiyiinta ayaa laga helayaa “Siddeed iyo toban saadaalinood” oo ku jira *Berakoth* 28b-29a. oo rumaystayaasha ugu yeeraya “Nazarenes” “Naasariiniyiinta.”

“Mar qura Naasariiniyiinta iyo kuwa dhaxalku muuq beeleen; iyaga waxaa laga tirtiri doonaa buugga nolosha oo kua rumaysadka leh lagulama qori doono.”

5. Waxa adeegsaday Justin Martyr, *Dial* 126:1, kaaso adeegsaday Ishaacyaah *netzer* kiisa Ciise.

C. Aragtida qoraaga

Waxaa iga yaabiyey dhawaaqyo badan oo uu ereygu leeyahay, inkasoo aan garanayo in aan Axdigii Hore loogu maqlin sida kitaabka (Yashuuca) dhexdiisa uu dhawr dhawaaq oo kala duwan ugu leeyahay luqada Cibraaniga. Waxyaalahan soo socdaa waxa ay igu sababeen inaan hubi waayo macnaheeda saxda ah:

1. Xidhiidhka dhow ee uu la leeyahay erayada la xidhiidha Masiixa ereyga “laan” (*netzer*) ama erayga la siman *nazir* (mid quduus ku ah ballan)
2. Xidhiidhka diidmada ah ee GaliiliMarka
3. Waa yar yahay ama maba jiro dareen ay dadkii ay isku xilliga ahaayeen ka qabeen magaalada Naasareet ee Galiili ku taalay.
4. Iyadoo kasoo baxday afkii jinniga markii uu lahaa (“Ma waxaad u timid in aad na burburiso?”)

Faahfaahin dhammays tiran oo la xidhiidha ereyadan, ka eeg Colin Brown (ed.), *The new International Dectionary of New Testament Theology*, vol. 2, bogga 346 ama Rymond E. Brown, kitaabkiisa Birth, pp. 209-213, 223-225.

▣ **“Isagii baan ahay”** macno ahaan waa falka Cibraaniga ah ee “ahaansho,” (eeg Mawduuca Gaarka ah 6:20), waxaana Axdiga Hore lagula xidhiidhin jiray YHWH isagoo ahaa magaca Ilaah ee axdiga (Baxniintii 3:14 iyo Ishacyaah 41:4). Ciise waxa uu muujinayaa inuu yahay muujinta Ilaah ee dhammayska tiran iyadoo naxwe ahaan ay isku mid yihiin (*ego eimi*) sida ku sugan 4:26; 8:24, 28, 58 iyo 13:19. Erayadanina cutubkan dhexdiisa waxay kusoo noqnoqonayaan saddex jeer iyadoo ujeedaduna tahay adkayn (aayadaha 6, 8). Qaabka naxwe ahaaneedna wuu ka gedisan yahay midka uu Ciise hadalkiisu u adeegsaday ee ah “Anigu.”

▣ **“Waxaana iyaga la taagnaa Yuudas kii gacan geliyey.”** Waa faallo kale oo ka ahaatay markhaatigii goob jooga ahaa, waana qoraaga Injiilka oo ah Yooxanaa.

18:6 “dib bay u socdeen, oo dhulkay ku dhaceen.” Tani waxa ay ahayd qaabka Yooxanaa u adkaynayay awoodda Ciise iyo joogitaankiisa. Dib ayay u laabteen iyagoo cabsanaya laakiinse may ahayn ixtiraam.

18:7 “Mar kale haddaba ayuu weydiyey” waxa suurto gal ah in Ciise uu iyaga isu soo jeedinayay isagoon u jeedinayn xertiisa, waana sida ka muuqanaysa aayadda 8.

18:8 “haddaad” waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah; iyagu waxay raadinayeen Ciise.

▣ **“kuwan iska daaya, ha tageene.”** Waa fal amar ah oo ku dhisan garasho. Tani haddaba waa wax sii sheegis ka ahaatay Sekeryaah 13:7 (Matayos 26:31; Yooxanaa 16:32).

18:9 “inuu dhammaado hadalkii uu ku hadlay” waxa ay tani tilmaamaysaa 16:32, laakiin xigashadu waa 17:12.

18:10 “Simoon Butros haddaba, isagoo seef haysta, ayuu soo bixiyey, oo wuxuu ku dhuftay wadaadka sare addoonkiisii, oo ka gooyay dhegta midigta” Butros ujeedadiisu may ahayn inuu dhegta ka jaro laakiin waxa uu rabay inuu qoorta ka gooyo! Tanina waxa ay tusinaysaa isaga oo rabay inuu u dhinto Masiixa, waxaana

laga yaabaa in ay tani ka dhalatay isaga oo si qaldan u fahmay hadalka Ciise ee ku sugan Luukos 22:36-38. Sidoo kale Luukos 22:51 ayaa inuu sheegaya inuu Ciise ninka dhegtiisii taabasho ku bogsiiyay.

▣ **“Addoonkii magiciisu wuxuu ahaa Malkos.”** Waa faallada qoraaga, taasina waxay muujinaysaa in Yooxanaa ahaa markaati goob joog ah!

18:11 “koobka” macnahani Axdiga Hore dhexdiisa waxa uu tsinayaa macne diidmo ah guud ahaan (Sabuurka 11:6; 60:3; 75:8; Ishacyaah 51:17, 22; Yeremyaah 25:15, 16, 27-28). Qaabka naxwe ahaaneed ee su’aasha Ciisena waxa uu filayaa jawaaba ah “haa.” Butrosna waxa uu u dhaqmay sidii isagoo ogsoon waxa wanaagsan (Matayos 16:22; Yooxanaa 13:8).

Adeegsiga “koob” ee halkani waxa uu ka gedisan yahay adeegsiga “koob” ee Injiillada kale ku diiwaan gelinayaan silicii Ciise ee Getsamane dhexdeeda. Yooxanaa waxa uu sheegayaa Ciise oo waxkasta ogsoonaan, isaga oo ka hadlayay kalsoonidii Ciise oonay cabsiyi ku jirin marnaba (aayadda 4; 13:1, 11)!

NASB (UPDATED) TEXT: 18:12-14

¹²Haddaba askartii iyo ninkii u sarreeyey iyo saraakiishii Yuhuudda ayaa Ciise qabtay, markaasay xidhxidheen, ¹³oo markii hore waxay u geeyeen Annas, waayo, wuxuu ahaa soddoggii Kayafas oo ahaa wadaadkii sare sannaddaas. ¹⁴Kayafas wuxuu ahaa kii kula taliyey Yuhuudda inay u roon tahay in nin keliyahu dadka u dhinto.

18:12

NASB “askartii iyo ninkii u sarreeyey”

NKJV “kooxdii ciidanka ahayd iyo taliyihii”

NRSV “askartii, taliyohoodii”

TEV “askartii Roomaanka iyo taliyohoodii”

NJB “askartii iyo taliyohoodii”

Magacyada ciidammada Roomaanka qaybohooa waxa lagasoo qaatay askar ka kooban

1. Askar – oo tilmaamaysa guuto ka kooban wax ka bilaabma 600 oo nin (aayadda 3)

2. Taliyaha – wuxuu ka bilaabmaa 1000 (chiliarch, Falimaha Rasuullada 21:31; 22:24; 23:10; 24:7)

Magacyadani waxba kama sheegayaan waynaanta ama yaraanshaha ciidankii xidhay Ciise. Falastiin dhexdeeda #2 hoggaamiyaha ama taliyuhu wuxuu ahaa mid madax u ah askar tiro yar.

▣ **“xidhxidheen,”** macneheedu maaha inay Ciise ka baqanayeen, laakiin waxa ay ahayd nidaam la raaco (aayadda 24).

18:13 “markii hore waxay u geeyeen Annas” waxa jirta dood badan oo ku saabsan maxkamadayntii Ciise ee Annas iyo Kayafas hortooda. Injiillada kale ma sheegayaan la kulankii Annas. Aayadda 24 ayaa u muuqata fiiri laakiinse waxay muhiim ka dhex tahay Injiillada kale (Matayos 26:57; Markos 14:53).

Axdiga Hore dhexdiisa asal ahaan wuxuunbaa jiray wadaad keliya, laakiinse ilaa wakhtigii gumaysigii Roomaanka, booska wadaadnimadu waxa uu noqday boos siyaasadeed oo lagu tartamo, sidoo kalena waxa iska dhaxli jiray qoysaska hodanka ah ee Yuhuudda. Haddaba, wadaadadii sarsare waxay ka cadhoodheen Ciise oo nadiifiyay Macbadka, maxaa yeelay waxa uu ahaa meesha ay ka heli jireen arsaaqaddooda.

Marka loo eego qoraallada Flavius Josephus, Annas waxa uu wadaaddada madax u ahay 6-14 C.D. waxa isaga magacaabay Quirinius, oo ahaa badha saabka Siiriya, balse waxa xilka ka tuuray Valerius Gratus, waxaana dhaxlay qoyskiisa (shan wiil oo uu dhalay iyo wiil uu awow u ahaa). Kayafas (C.D. 18-36), isna wuxuu xidid la ahaa Annas (Yooxanaa 18:13), waxaanu ahaa mid awood leh, sidaasi darteedna Yooxanaa wuxuu inoo sheegayaa inuu ahaa kii Ciise loo geeyay (18:13, 19-22).

18:14 waa faallo kale oo Yooxanaa u bixinayo si la mida aayadaha 15 iyo 18.

▣ **“Kayafas”** Yooxanaa waxa uu muhiimadda u saarayaa Kayafas isaga oo kusii baraarugay dhimashada Ciise balse aan ka warqabin (11:50). Kayafas waxa uu ahaa Annas xididkiisa sidoo kalena wadaadka u sarreeya ayuu ahaa sanadihii C.D. 18-36. Eeg fiirada 11:49.

NASB (UPDATED) TEXT: 18:15-18

¹⁵Waxaa Ciise daba socday Simoon Butros iyo mid kale oo xer ah. Ninkaas xerta ahaa wadaadka sare waa garanayay, wuuna la galay Ciise barxadda wadaadkii sare. ¹⁶Butros se wuxuu taagnaa albaabka agtiisa oo dibadda ah. Sidaa daraaddeed kii kale oo xerta ahaa oo wadaadka sare garanayay ayaa dibadda u soo baxay oo la hadlay tii albaabka ilaalinaysay, oo Butros ayuu soo geliyey. ¹⁷Gabadhii albaabka ilaalinaysay waxay Butros ku tidhi, Adiguna ma waxaad tahay mid ka mid ah ninkan xertiisa? Wuxuu ku yidhi, Ma ihi. ¹⁸Markaasaa waxaa taagnaayeen addoommadii iyo saraakiishii oo dab dhuxul ah sameeyey, maxaa yeelay, dhaxan bay ahayd, wayna kulaalayeen. Butrosna wuu la joogay, isagoo taagan oo dabka kulaalaya.

18:15 “Waxaa Ciise daba socday Simoon Butros iyo mid kale oo xer ah” waxa jira aragtiyo ku saabsan xaddidista kan kale oo xerta ahaa:

1. Aragtida asalka ahi waxa ay sheegaysaa inuu ahaa Yooxanaa sababtuna waa iyadoo erayo middan la mid ahi ay kusoo aroorayaan 20:2, 3, 4, iyo 8, sidoo kalena waxa laga yaabaa Yooxanaa 19:25 oo magacaabaysa Yooxanaa hooyadiis, iyadoo suurto gal ay tahay inay ahayd Maryan walaasheed, taasina waxa ay ka dhigan tahay inuu ahaa reer Laawi, isla markaana uu ka mid ahaa qoyska wadaaddada (markhaatiga Polycarp).
2. Kan xerta ahi waxa uu noqon karaa mid ka mid ahaa kuwii Ciise raacsanaa sida Nikodemos ama Yuusufkii reer Aramatiya, maxaa yeelay waxa uu ku xidhnaa wadaadka sare iyo qoyskiisa (aayadaha 15-16).

▣ **“Ninkaas xerta ahaa wadaadka sare waa garanayay”** erayga “garanayay” waxa uu tilmaami karaa xidhiidh saaxiibtinimo dhow ah (Luukos 2:44 iyo 23:49). Injiilka Yooxanaana waxa ay la xidhiidhi kartaa shaqadii ugaadhsiga ahayd ee qoyskiisu ku uu kalluunka ku gaadhsiin jiray Yerusaaalem.

18:17 “Gabadhii albaabka ilaalinaysay waxay Butros ku tidhi, Adiguna ma waxaad tahay mid ka mid ah ninkan xertiisa?” qaab dhismeedka naxwe ahaaneed sida aayadda 25 oo kale waxa uu filayaa jawaab diidmo ah. su’aashu waxa ay muujinaysaa iyadoon Ciise la magacaabaynin, waxaana laga yaabaa inay su’aasha u waydiisay (1) Butros oo Yooxanaa ku xidhnaa ama (2) Butros lahjaddiisa ahayd Galiiliyaanka.

▣ **“ma ihi”** Waxa laga yaabaa inuu Butros diyaar u ahaa inuu Ciise dartiis u dhinto, laakiinse diyaar umuu ahayn inuu si runa uga jawaaba su’aashii naagta! Dafiritaankii Butros waxa uu kusoo aroorayaa sidoo kale Injiillada kale, laakiin Yooxanaa waxa kasoo dhex galaya Annas oo Ciise wax waydiinaya (aayadda 24). Butros hadalkiisu ah “anigu” waxa ay kasoo horjeedda “Aniga” da Ciise (aayadda 5).

18:18 u fiirso dhacdadani sida ay u faah faahsan tahay. Aayadaha 18 iyo 25 waa ficil tegay oo sii soconaya.

NASB (UPDATED) TEXT: 18:19-24

¹⁹Haddaba wadaadkii sare wuxuu Ciise wax ka weydiiyey xertiisii iyo waxbariddiisii. ²⁰Ciise ayaa ugu jawaabay. Bayaan baan dunida ula hadlay, oo weligay wax baan ku bari jiray sunagogyada iyo macbudka, meesha ay Yuhuudda oo dhammi isugu timaado, oo waxba si qarsoon uma odhan jirin. ²¹Maxaad ii weydiinaysaa? Weydii kuwa. ²²Markuu sidaas yidhi saraakiishii midkood oo ag taagnaa ayaa Ciise dharbaaxay isagoo leh, Ma saasaad ugu jawaabaysaa wadaadka sare? ²³Ciise ayaa ugu jawaabay, Haddii aan si xun u hadlay, xumaanta ka marag fur, haddaan si wanaagsan u hadlayse, maxaad ii dharbaaxaysaa? ²⁴Annas haddaba wuxuu isagoo xidhxidhan u diray Kayafas oo ahaa wadaadka sare.

18:19 “wadaadkii sare wuxuu Ciise wax ka weydiiyey xertiisii iyo waxbariddiisii.” Waxa ay tani tilmaamaysaa Annas mana aha Kayafas. Annas waxa uu ahaa awoodda ugu muhiimsan isaga oo xukunkiisu ahaa C.D. 6-15. Waxaana xukunka uga danbeeyay ninkii ahaa xididkiisa iyo shantiisii wiil iyo wiilkuu u ahaa awowga.

Annas, waxa uu sugayay jaaniska ahaa inuu la kulmo ka nadiifiyay Macbadka, waxaana suurto gal ah inuu aad u danaynayay xertay Ciise iyo isaga waxbaristiisa.

18:20 waxa hubaala in Ciise si muuqata oon qarsoodi ku jirin uu dadka wax u baray. Sidoo kalena waxa hubaala in qayb ka mida waxbaristiisu ay ka qarsoonayd dadka oo dhan (Markos 4:10-12). Arrinta runta ahina waxay ahayd indho la'aanta ruux ahaaneed ee ka qayb ahayd dhegaystayaashiisa.

Hadalladii Ciise iyo qaabkooda siyaabo kala duwan ayay ugu kala qoran yihiin Yooxanaa iyo Injiillada kale. Injiillada kale ma qorayaan “Anigu” oo ka mid ahayd Ciise hadalladiisa. Ciise waxa uu wax ku baray masaallo, laakiin Yooxanaa wax misaal ah qori maayo. Waxa ay aniga markaa iila muuqataa in waxbarista Ciise ee guud ahaaneed lagu diiwaan geliyay Injiillada kale, halka kuwii gaarka ahaana lagaga diiwaan geliyay Yooxanaa.

18:21 “Maxaad ii weydiinaysaa?” Ciise aayadda 20 waxa uu ku adkaynayaa dabiicadda adeeggiisa waxbariseed ee guud ahaan, halkanna Annas waxa uu ugu adkaynayaa in su'aalihiiisu aanay sharci ahayn marka loo eego qaanuunka Yuhuudda.

18:22 “saraakiishii midkood oo ag taagnaa ayaa Ciise dharbaaxay isagoo leh” waxa ay ka dhigan tahay “dharbaaxis” gacanta ama wax kale ah. Waxa ay u noqonaysaa Ishacyaah 50:6. Ciise waxa uu dalbanayaa inuu muujiyo khaladka uu ku dhawaaqay, haddii kale waa maxay sababta dharbaaxada ku timid?

18:23 “haddii...haddii” waa labo jumlad shuruudood oo heerka koobaad ah qoraaga xaggiisana waxay xanbaarsantay ujeedo sax ah. Ciise waxa uu Annas ku xujaynayaa inuu keeno caddayntiisu.

18:24 qaabka maxkamadayntani waxa uu ka gedisan yahay sida Injiillada kale.

NASB (UPDATED) TEXT: 18:25-27

²⁵Simoon Butros ayaa taagnaa oo dabka kulaalayay. Haddaba waxay ku yidhaahdeen, Adiguna ma waxaad tahay maqlay waxaan kula hadlay. Bal eeg, kuwaasaa og waxaan idhi e. xertiisii midkood? Markaasuu inkiray oo yidhi, Ma ihi. ²⁶Addoommadii wadaadka sare midkood oo qaraabo ay ahaayeen kii Butros uu dhegta ka gooyay wuxuu yidhi, Miyaanan beerta kugula arkin isaga? ²⁷Haddaba Butros mar kale ayuu inkiray, oo markiiba diiqii baa ciyey.

18:26 “Addoommadii wadaadka sare midkood oo qaraabo ay ahaayeen kii Butros uu dhegta ka gooyay wuxuu yidhi” waxa jira khilaaf u dhexeeya Injiillada afarta ah kaasi oo ku saabsan cidda halkan Butros wax ku su'aashay:

1. Markos, naagtii jaariyadda ahayd ayaa su'aasha hore waydiisay (Markos 14:69)
2. Matayos, waa naag kale oo midiidin ah (Matayos 26:71)
3. Luukos 22:58 waa nin kale
4. Yooxanaa waa addoonkii Wadaadka Sare

Macnaha taariikh ahaaneed waxa uu tusinayaa inuu ahaa qof dabka dul taagnaa, sidoo kalena kuwo kale ayaa su'aasha kusoo celiyay (aayadda 18).

18:26 “Miyaanan beerta kugula arkin isaga?” iyadoo ka duwan labada su'aalood ee aayadaha 17 iyo 25, qaab dhismeedka naxwe ahaaneed wuxuu filaya jawaab oggolaansho ah.

18:27 “Butros mar kale ayuu inkiray,” waxa aan ka fahmi karnaa Markos 14:71 iyo Matayos 26:74 in Butros inkiristiisa uu raaciyay dhaar.

▣ **“oo markiiba diiqii baa ciyey”** wakhtiga dhacdooyinku waxa uu tusinayaa inuu ahaa intii u dhexaysay 12:00 duhurnimo iyo 3:00 waa sida afarta Injiilba dhigayaan. Waxa uu diiggani ahaabaa laga yaabaa diig Roomaan ah, maxaa yeelay Yuhuuddu magaalada Yerusaaalem umay oggolaan jirin xayawaanka.

Luukos 22:61 ayaa sheegaya in Ciise uu eegay Butros. Waxa haddaba suurto gal ah in Annas iyo Kayafas ay guri ku wada noolaayeen, iyadoo markaasna askarta ay Ciise u geeyeen Annas ama Kayafas inuu wax waydiiyo,

wakhtigan ayaanu Ciise eegay Butros. Hase ahaatee tani waa male oo keliya, maxaa yeelay ma hayno warbixinta buuxda ee lagu habayn karo maxkamadayntii habeenkaas.

NASB (UPDATED) TEXT: 18:28-32

²⁸Haddaba Ciise ayay ka kaxeeyeen Kayafas ilaa guriga taliyaha. Waxay ahayd aroortii hore, oo iyagu ma ay gelin guriga taliyaha si aanay u nijaasoobin, laakiinse inay Cashadii Iidda Kormaridda wax ka cunaan. ²⁹Bilaatos haddaba ayaa u soo baxay iyagii oo ku yidhi, Maxaad ku ashtakaynaysaan ninkan? ³⁰Way u jawaabeen oo ku yidhaahdeen, Ninkanu haddaanu ahayn xumaanfale, kuuma aannu soo gacan gelinneen. ³¹Haddaba Bilaatos wuxuu ku yidhi, Idinku qaata, oo sharcigiinna ku xukuma. Yuhuuddu waxay ku yidhaahdeen, Xalaal nooma aha inaannu nin dillo. ³²inuu ahaado hadalkii Ciise ku hadlay kolkuu sheegay siduu u dhiman doono.

18:28

NASB, NKJV, JB “ilaa guriga taliyaha”

NRSV “ilaa xaruntii Bilatos”

TEV “ilaa gurigii xaakinka”

Waa erayo Laatiin ah oo lagu tilmaamayay meesha uu deggan yahay xaakinka ama badhisaabka Roomaanka ah ee ku sugnaa Yerusaleem. Waxa meeshani ay noqon kartaa Antoniyo oo u dhowayd Macbadka ama qasrigii Herodos.

MAWDUUC GAAR AH: ILAALADA GURIGA BADHASAABKA

Asala ahaan guriga amaba qasriga badhasaabka Roomaanka waxa lagu magacaabi jiray (*praetor*), laakiinse wakhtiyadii danbe waxa loo adeegsan jiray macnaha tusinaya maamulka ama siyaasadda iyo waxa la xidhiidha (Matayos 27:27; Yooxanaa 18:28,33; 19:9; Falimaha Rasuullada 23:35).

Koox ka mida ciidammada Roomaanka ayaa loo yaqaanay Ilaalada Boqortooyada, waxaana aasaasay Augustus, laakiinse ugu danbaytii Tiberius ayaa isugu soo koobay Rooma, waxaana iyaga gaar u ahaa

1. Waxay isku hal guuto
2. Waxay heli jireen mushahar laban laab ah
3. Faa'idooyin kale oo dheeraada ayay lahaayeen
4. Waxay lahaayeen awood wayn oo xitaa Boqorka ayaa sharfi jiray

Waxay ahaayeen koox aad u xooggan ilaa markii danbe wakhtigii Konstantiin ay baaba'een.

▣ **“Waxay ahayd aroortii hore”** qoraallada Roomaanku waxa ay inoo sheegayaan in masuuliyiinta Roomaanku ay maxkamadaynta ku kulmi jireen subaxnimada. Waxay u muuqataana in gudiga Senhadriinku ay habeenkii oodhan ku dhammaysteen iyagoo raadinaya caddaymo ay ku xukumaan Ciise, markii waagu baryayna Bilatos ayay u keeneen Ciise.

▣ **“oo iyagu ma ay gelin guriga taliyaha si aanay u nijaasoobin,”** waxa caadadoo ka mid ahaa in aanay gelin guriga taliyaha iyagoo is lahaa waad nijaasoobaysaan, sidoo kalena waxa ay rabeen qof aan denbi lahayn inay dhimasho ku xukumaan.

Aayaddani waxa ay koobsanaysaa arrin muhiim ah marka la eego waxyaabaha Injiilka Yooxanaa kaga duwan yahay Injiillada kale, iyadoo halka Injiillada kale ay ka sheegayaan in Ciise uu Kormaristii xertiisa wax la cunay (Matayos 26:17; Markos 14:12; Luukos 22:1), ayaa Yooxanaa waxa uu sheegay arrintaasi inay dhacday maalintii Khamiista, oo ahayd maalintii diyaar garaynta Kormarista. Caalimka Roman Catholic Johannine, Raymond Brown ayaa faalladan ku bixinaya Jerome Biblical Commentary:

“Haddii Injiillada kale lagu kala doorto dhinaca taariikhiga, tani waa mid kusoo aroortay Injiilka Yooxanaa oo ahaa markaati goob jooga isagoo sidoo kalana garanayay Injiillad akale, waxaynu haddaba waajaynaa dhibaato aan la xallin karin. Haddii markaas aan doorano Yooxanaa oo markaati goob jooge ah ahaa xaqiiqadana u dhowaa, aayaddani markaas waxay noqonaysaa mid la fahmi karo” (p. 458).

Waxa jirta oo suurto gala in labo maalmood loo dabbaal degi karo ciidda Kormarista, Khamiista iyo Jimcaha. Dhinaca kalena waxa jirta dhibaato dheeraad ah, waana suurto galmimada adeegsiga erayga “Kormaris” isaga oo

tilmaamaya maalin keliya, amaba dhammaanba sideedda cisho ee dabaal degga (Kormarista aan lahayn kibista khamiisan, Baxniintii 12).

▣ **“Idda Kormaridda wax ka cunaan.”** Waxa jirta dhibaatooyin ah xadidista taariikhda cashadii ugu danbaysa goortay ahayd. Injiillada kale waxay sheegayaan in cashadii u dambaysay ahayd cuntadii Kormarista, halka Yooxanaa uu kaga tilmaamayo inay ahayd maalintii ka horrayay cuntada Kormarista ee rasmiga ah (Yooxanaa 19:14 iyo aayaddan) jawaabtu waxay markaas noqon kartaa:

1. Xaqiiqada erayga “kormaris” oo tilmaami kara usbuuca, cuntada, ama Sabtida gaarka ah
2. Xaqiiqada ah iyadoon kuwo ka mida kooxaha Yuhuuddu ay raacaan tirsiga lunarka oo ka ahaaday kitaabka Jubilees.
3. Xaqiiqada ah Yooxanaa oo labo macne kusoo jeedinaya Ciise oo ahaa wankii Kormarista (1:29), kaasi oo la diyaarin jiray maalintaa ka horraysa Kormarista.

18:29 Ilaah waxa uu adeegsaday Bilatos sidii horeba uu ugu adeegsaday Fircoon. Bilatos waxa badhasaab ahaan Yahuudiya ugu magacaabay Tiberius C.D 26, isagoo bedelay Valerius oo jagada uu ka qaaday Annas. Bilatos wuxuu ahaa badhasaabkii shanaad oo Roomaan ah, waxaanu maamulayay boqortooyadii Archelaus (wiilkii Herodos kii waynaa), taasi oo koobsanaysay Samaariya iyo Yahuudiya, Qasa, iyo Badda Dhimatay. Meesha ugu badan ee warbixinta ku saabsan Bilatosna waxa weeyi qoraallada Josephus.

MAWDUUC GAAR AH: BONTIYAS BILAATOS

I. Ninka

- A. Meesha uu ku dhashay iyo taariikhda la garan maayo
- B. Waxa uu ka mid ahaa dabaqaddii dhexe ee Istuqraadiga
- C. Xaas buu lahaa, laga yaabaa inuu bilaa carruur ahaa
- D. Mansbayadii uu hore u qabtay lagaran maayo

II. Shakhsiyaddiisa

A. Labo aragtiyood oo kala duwan

1. Wuxuu ka dhigayaa Faylo (*Legatio and Gaium*, 299-305) iyo Josephus (*Antiq.* 18.3.1 iyo *Jewish Wars* 2.9.2-4), inuu ahaa nin digtaytor ah oo bilaa naxariisa.
2. Axdiga Cusub (Injiillada iyo Falimaha Rasuullada) wuxuu ka dhigayaa inuu ahaa nin jilicsan oo lagu ciyaari karayay

B. Paul Barnett, *Jesus and the Rise of Early Christianity*, wuxuu ku muujinayaa tafsiirka lagu qanci karo ee labadan aragtiyood

1. Bilaatos muu magacaabin Tiberiyas kii Yuhuudda taageeri jiray sanadkii 26 C.D. (Philo, *Legatio and Gaium*, 160-161), balse waxa magacaabay la taliyihii Tiberiyas oo ahaa Sejanus, oo necbaa Yuhuudda.
2. Tiberiyas waxa uu ka cabsanayay isagoo awooddiisii siyaasadeed u gacan gashay Sejanus oo Yuhuudda necnbaa isla markaana dhaxli rabay kursiga (Philo, *Legatio land Gaium*, 159-160).
3. Bilatoos waxa uu daacad u ahaa Sejanus oo uu isku dayi jiray inuu ku raalli geliyo
 - a. Keenista calaamadihii ilaahyada Roomaanka Yerusaaalem dhexdeeda (C.H. 26) taasina Yuhuudda waxay ku sababaysay inay ka cadhoodaan (Josephus kitaabkiisa *Antiq.* 18.3.1; *Jewish Wars* 2.9.2-3).
 - b. Dhaqan gelinta lacagii Roomaanka (C.D. 29-31) oo ay ku sawirnaayeen waxyaabaha Roomaanku caabudaan. Josephus ayaana sheegaya inuu Bilaatos rabay bedelitaanka shareecada iyo dhaqanka Yuhuudda ((Josephus, *Antiq.* 18.4.1-2)
 - c. In dhaqaale laga helo khasnadda Macbadka si mashruucyo looga dhiso Yerusaaalem (Josephus, *Antiq.* 18.3.2; *Jewish Wars* 2.9.3).
 - d. Waxa uu laayey kuwo ka mid ahaa reer Galiili oo qurbaan ku samaynayay Yerusaaalem (Luukos 13:12).
 - e. Waxa uu Yerusaaalem keenay dhufaysyadii Roomaanka C.H. 31. Arrintaasna waxa kasoo horjeestay wiilkii Herodskii Waynaa, sidaasi darteedna Tiberiyas wuxuu soo saaray amar dhufaysyada dib loogusoo celinayo Qaysariya (Philo, *Legation and gaium*, 299-

305).

- f. Kuwo badan oo reer Samaariya ah ayuu ku dul laayey Buur Gerisim (C.D. 36/37) iyagoo raadinaya waxyaabo muqadas u ah diintooda, taasina waxa ay Bilaatos masuulkiisii (Vitellius, taliyihii Siiriya) ku sababtay inuu isaga xilka ka qaado una diro Rooma (Josephus, Antiq. 18.4.1-2).
4. Sejanus waxa dil lagu fuliyay sanadkii C.D. 31 iyadoo kaddibna Tiberiyaas uu soo ceshaday awooddiisii siyaasadeed oo buuxda, sidaasi darteedna, Bilatos waxa uu sameeyay #a, b, c isagoo raadinayay kalsoonida Sejanus; halka #e iyo f uu iskaga deyay inuu ku raalli geliyo kalsoonida Tiberiyas, laakiinse ugu dambayntii may anficiin isaga.
5. Waxa muuqata markaa Tiberiyas oo awooddii siyaasaddiisa soo ceshaday, isla markaana u diray badhisaaabyada farrin ah inay Yuhuudda si fiican ula macaamaloodaan (Philo, *Legatio and Gaium*, 160-161), taasi hoggaamiyayaasha Yuhuudda waxay u suuro gelisay inay ka faa'idaystaan jilayca Bilatos oo ku dheel dheelaan, si ay Ciise isku tallaabta ugu qodbaan. Haddaba aragtidan ayaa xallinaysa khilaafka u dhexeeya labada aragtiyood.

III. Halkuu ku danbeeyay

- A. Waxa loogu yeedhay Rooma ka hor waxyaruun dhimashadii Tiberiyas (C.D. 37).
B. Meel kale looma magacaabin
C. Intaas kaddib, noloshiisa wax badan kama garanayno.

18:30 “Ninkanu haddaanu ahayn xumaanfale, kuuma aannu soo gacan gelinneen” waa weedh shuruudeed heerka labaad ah sheegaysana “wax liddi ku ah xaqiiqada.” Ciise muu ahayn xumaan fale, balse tani waa tuhun beena oo lagu qancin rabay Bilaatos oo diiday inuu baadhitaan ku sameeyo wax khuseeya diinta Yuhuudda. Erayga “gacan gelin” waxa loo adeegsaday Yuudas (6:68, 71; 12:4; 13:2, 11, 21; 18:2, 5). Macno ahaanna eragani waxa uu tusinayaa “in qof loo gacan geliyo maamul iyadoo wax lagu eedaynayo.”

18:31 “Xalaal nooma aha inaannu nin dillo, ” hogaamiyayaasha Yuhuuddu Ciise waxay ku eedeeyeen inuu sheegtay isagoo ah wiilka Ilaah, laakiinse waxay adeegsadeen eedayn ah inuu xumeeyay Qaysar oo wax ka sheegay. Waxa muhiim u ahayd hogaamiyayaasha diintu inay Ciise xukumaan iyadoo waafaqsan Sharciga Kunoqoshadiisa 21:23. Ciise haddaba middan hore usii sheegay sida ku sugan aayadaha 32; 3:14; 8:28; 12:32, 33; iyo Galatiya 3:13.

18:32 “kolkuu sheegay siduu u dhiman doono” hogaamiyayaasha Yuhuuddu maxay u rabeen in Ciise isku tallaabta loogu qodbo? Waxa ka muuqata Falimaha Rasuullada 7 iyagoo kuwo caytanka sameeya lagu dilay jiray dhagxin. Waxa suurto gal ah in middani ay la xidhiidho waxa kusoo arooray Sharciga Kunoqoshadiisa 21:22-23. Asal ahaana qofka waxa la dul dhigi jiray loox marka uu dhinto kaddib, laakiinse rabbiyintu waxay u fahmeen in lagu kor dilo isku tallaabta Roomaanka. Waxa ay rabeen in Ilaah uu nacdalo kan sheegtay Masiixa inuu yahay, iyadoo middanina ahayd qorshaha Ilaah ee ku waajahan badbaadada iyo madax furashada uu Ciise naftiisa ku keenayo isaga oo ah wanka Ilaah (1:29), oo u dhimanaya beddelkeena (Ishacyaah 53; 2 Korintos 5:21). Ciise waxa uu inga inoo noqday “inkaar” (Galatiya 3:13).

18:33 “guriga taliyaha” eeg Mawduuca Gaarka ah 18:28.

▣ **“Adigu ma waxaad tahay Boqorka Yuhuudda?”** Ciise waxa lagu eedeeyay khiyaano (Matayos 27:1; Markos 15:2; Luukos 23:2 iyo Yooxanaa 19:3, 12, 15, 19-22).

18:34 “Ciise ayaa ugu jawaabay, Ma adaa iska odhanaya waxaas, mise kuwa kalaa iiga kaa sheegay?” haddii Bilaatos uu Ciise waydiin lahaa wax khuseeya boqortinimada siyaasadda, Ciise waa uu diidi lahaa. Haddii se Yuhuuddu taas ay ku sheegeen iyagoo tilmaamaya Masiixa, Ciise taas wuu sheegi lahaa. Waxa haddaba, muuqata in Bilaatos aanu diyaar u ahayn inuu galo mowduucyada diiniga ah (aayadda 35).

18:35 su’aasha koobaad waxay filaysaa jawaaba diidmo ah. Bilaatosna waxa uu muujinayaa isagoon jeclaysanayn diinta Yuhuudda.

18:36 “Haddii boqortooyadaydu tan dunidan tahay, midiidinyadaydu waa ii diriri lahaayeen” waa weedh shuruudeed heerka labaad ah laguna magacaabo “liddi ku ah xaqiiqada.” Waxa loo fahmi karaa “haddii Boqortooyadaydu dunidan ka ahaan lahayd, kama aha ee, waxa ii diriri lahaa midiidinnadayda, laakiin ma diririyaan.” Haddaba, erayga “midiidinadayda” waxa ay tilmaami kartaa (1) xerta ama (2) malaa’igaha (Matayos 26:53).

18:37 “Sidaa daraaddeed Bilaatos ayaa ku yidhi, Haddaba ma boqor baad tahay?” waxa arrin lala yaabo ah inuu Bilaatos oo metalaya awoodda dhulku, uu ereyadan ku hadlo isaga oo hor jooga boqortooyada Ciise ee ruuxiga ah. su’aahuna waxa ay filaysaa jawaaba oggolaansho ah.

▣ **“Waad tidhaahdaa inaan boqor ahay. Taas ayaan u dhashay, oo taas ayaan dunida u imid”** waxa adag tarjumaadda erada hore oo qarsoon. Waa sheegitaan xaddidan (Matayos 27:11; Markos 15:2; Luukos 23:3). Ciise waxa uu ogsoonaa cidda uu yahay iyo sababta uu u yimid (Yooxanaa 13:1, 3; Markos 10:35; Luukos 2:49; Matayos 16:22ff), laakiin Bilaatos waxba kamuu fahmin!

▣ **“Taas ayaan u dhashay”** Ciise waxa uu muujinayaa shaqadiisa ah muujinta Aabbaha. Asal ahaanna waxa jirta saddex sababood oo Ciise u yimid

1. Inuu si buuxda u muujiyo dabeecadda iyo qorshaha Ilaah (1:18; 3:32)
2. Inuu u dhinto denbiyada dadka isagoo ah wanka Ilaah (1:29)
3. Inuu rumaystayaasha siiyo tusaalaha ay ku noolaan lahaayeen ee Ilaah ku raalli gelin lahaayeen.

▣ **“Mid kasta oo kan runta ah wuu maqlaa codkayga”** Waxa markasta I dhaqaajiya “qofkasta” ama “cid kasta” oo sidaas ah! YHWH waxa uu Ciise ku dhammays tiraya Bilwogii 3:15. Ciise waxa uu dib u hagaajinaya ekaanshaha Ilaah ee leexashadu dhaawacday, waxaana markale suurto gal ah xidhiidh is weheshi ah, iyadoo haddana is weheshigii dib loo soo celiyay.

Keliya kuwa leh indhaha iyo dhegaha ruuxiga ah (10:3, 16, 27; 18:37) ayaa fahmi kara runta (Matayos 11:15; 13:9, 16, 43; Markos 4:9, 23; Luukos 8:8; 10:23, 24; 14:35; Muujintii 2:7, 11, 17, 29; 3:6, 13, 22). Ciise waa runta (14:6) marka uu hadlayana kuwa isaga raacaa way maqlaysaan (10:1-5). Yooxanaa dhexdiisa “arag” ama “maql” ka runtu fiqi ahaan waxa uu ka dhigan yahay aqbalitaanka “nolosha weligeed ah.”

NASB (UPDATED) TEXT: 18:33-38a

³³Bilaatos haddaba guriga taliyaha ayuu mar kale galay oo Ciise u yeedhay, oo wuxuu ku yidhi, Adigu ma waxaad tahay Boqorka Yuhuudda? ³⁴Ciise ayaa ugu jawaabay, Ma adaa iska odhanaya waxaas, mise kuwa kalaa iiga kaa sheegay? ³⁵Bilaatos ayaa ugu jawaabay, Ma Yuhuudi baan ahay? Quruuntaadii iyo wadaaddadii sare ayaa ii soo kaa gacan geliyeye. Maxaad samaysay? ³⁶Ciise ayaa ugu jawaabay, Boqortooyadaydu tan dunidan ma aha. Haddii boqortooyadaydu tan dunidan tahay, midiidinyadaydu waa ii diriri lahaayeen inaan Yuhuudda la ii gacan gelin. Imminkase boqortooyadaydu tan halkan ma aha. ³⁷Sidaa daraaddeed Bilaatos ayaa ku yidhi, Haddaba ma boqor baad tahay? Ciise ayaa ugu jawaabay, Waad tidhaahdaa inaan boqor ahay. Taas ayaan u dhashay, oo taas ayaan dunida u imid, inaan marag u furo runta. Mid kasta oo kan runta ah wuu maqlaa codkayga. ³⁸Bilaatos ayaa ku yidhi, Waa maxay runtu?

NASB (UPDATED) TEXT: 18:38b-40

^{38b}Oo markuu sidaa ku yidhi, mar kale ayuu Yuhuudda u baxay oo ku yidhi, Eedna isagii kuma aan helin. ³⁹Laakiin waxaad leedihiin caado inaan mid idiin sii daayo Iidda Kormaridda. ⁴⁰Haddaba ma doonaysaan inaan idiin sii daayo Boqorkii Yuhuudda?

18:38 “Bilaatos ayaa ku yidhi, Waa maxay runtu?” Bilaatos su’aashan ayuu waydiiyay, laakiin intaanu jawaabta maqlin ka hor ayuu baxay. Bilaatos waxa uu rabay inuu ogaado inaanu Ciise wax khatara ku lahayn xukuumadda Roomaanka, intaas kaddibna wuxuu isku dayay inuu Ciise sii daayo sidii caadada ahayd Kormarista dhexdeeda (aayadda 39; Matayos 27:15). Yooxanaa waxa uu wax u qoray sida Luukos, isaga oo tusinaya in Masiixiyaddu aanay wax caga juglayna ku haynin Boqortooyada Roomaanka (18:38b; 19:4; Luukos 23:4, 14, 22).

18:39 “waxaad leedihiin caado” caadadan waxa lagu sharaxay Matayos 27:15 iyo Luukos 23:17 (laakiin qoraallada taariikhiga ah ee ka baxsan Axdiga Cusub laguma garanayo).

18:40 “Kolkaasay dhammaan mar kale qayliyeen iyagoo leh, Ninkan ma aha, laakiin Baraabbas.” Waxa la yaab leh iyada oo Baraabbas uu ka tirsanaa xisbigii ku kacsanaa Roomaanka, waxayna la mid tahay tuhunkii beenta ahaa ee lagu eedayay Ciise (Markos 15:7; Luukos 23:19, 25). Waxa aan shaki ku jirin in dadkii halkaas joogay ay taageerayeen halyaygooda shacab ahaaneed ee Baraabbas. Hogaamiyayaashii Yuhuudduna waxay jaaniskan uga faa’idaysteen xukumitaanka Ciise (Markos 15:11).

Waxa kaloo la yaab leh magaca “Baraabbas” oo macnihiisu yahay “wiilka aabbaha.” Yooxanaana ereyadan isu macnaha eeg ayuu adeegsanayaan. Dadku waxa ay rabeen in “wiilka aabbaha” la sii daayo beddelka “Wiilka Aabbaha.” Mugdiguna si buuxda ayuu u yimid!

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu Ciise u tegay meel uu ogsoonaan inuu Yuudas garanayo oo uu ka heli karo isaga?
2. Muxuu Yooxanaa uga tegayaa diiwaan gelinta silicii Ciise ee Getsamane dhexdeeda?
3. Gudiga Senhadriinku maxay Ciise ugu geeyeen Bilaatos?
4. Maxaa u sabab ah is khilaafka kala horraynta dhacdooyinka ee u dhexeeyay Injiillada kale iyo Yooxanaa?
5. Muxuu Yooxanaa u muujinayaa Bilaatos oo isku dayay inuu sii daayo Ciise?

YOOXANAA 19

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ciise waxa lagu xukumay dhimasho (18:38b-19:16a) 18:38b-19:7	Askartii oo Ciise ku dheel dheelay 19:1-4 Go'aankii Bilaatos 19:5-16	(18:38b-19:7) 18:38b-19:7	Ciise dhimashaa lagu xukumay (18:38b-19:7) 18:40-19:3 19:4-5 19:6a 19:6b 19:7	Ciise oo horjooga Bilaatos (18:28-19:11) 18:33-19:3 19:8-11
19:8-12		19:8-12	19:8-9a 19:9b-10 19:11	
19:13-16a		19:13-16a	19:13-14 19:15a 19:15b	Ciise dhimashaa lagu xukumay 19:12-16a
Iskutallaab ku qodbistii Ciise 19:16b-22			19:15c 19:16a	
	Boqorkii oo isku tallaabta saaran 19:17-24		Ciise isku tallaabtaa lagu qodbay 19:16b-21 19:22	Iskutallaab ku qodbistii 19:16b-22
19:23-27	Arag hooyadaa 19:25-27	19:16b-25a	19:23-24	Maryihii Ciise waa la qaybsaday 19:23-24
		19:25b-27	19:25-26 19:27	Ciise iyo hooyadiis 19:25-27
Dhimashadii Ciise 19:28-30	Waa dhammaatay 19:28-30	19:28-30	Dhimashadii Ciise 19:28 19:29-30a 19:30b	Dhimashadii Ciise 19:28 19:29-30
Dhinac ka mudistii Ciise 19:31-37	Ciise dhinacaa laga muday 19:31-37		Ciise dhinacaa laga muday 19:31-37	Dhinacii la muday 19:31-37
Aasitaankii Ciise 19:38-42	Ciise waxa lagu aasay xabaashii Yuusuf 19:38-42	19:31-37	Aasitaankii Ciise 19:38-42	Aasitaankii 19:38-42

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 19:1-7

¹Markaasaa Bilaatos haddaba Ciise watay oo karbaashay. ²Askartiina taaj ayay qodxan uga taxeen, oo madaxiisay saareen, oo waxay u geliyeen dhar guduudan. ³Markaasay u yimaadeen oo ku yidhaahdeen, Nabad Boqorka Yuhuuddow, wayna dharbaaxeen. ⁴Bilaatos haddana dibaddu u baxay oo ku yidhi iyaga, Eega, isagaan idiin soo bixinayaa inaad ogaataan inaan eed ku helin. ⁵Ciise haddaba ayaa dibadda u soo baxay isagoo sita taajkii qodxanta ahaa iyo dharkii guduudnaa, oo Bilaatos ayaa ku yidhi iyaga, Bal eega ninka. ⁶Sidaa daraaddeed markii wadaaddadii sare iyo saraakiishii arkeen, ayay qayliyeen iyagoo leh, Iskutallaabta ku qodob, iskutallaabta ku qodob. Bilaatos ayaa ku yidhi, Idinku wata, oo iskutallaabta ku qodba, waayo, anigu eed kuma aan heline. ⁷Yuhuuddii ayaa ugu jawaabtay, Sharci baannu leennahay, sharcigaas xaggiisana waa inuu dhinto, waayo, wuxuu iska dhigay Wiilka Ilaah.

19:1 “Markaasaa Bilaatos haddaba Ciise watay oo karbaashay.” Ma garan karno wakhtiga uu dhacay karbaashitaanku, waxaana caado ahayd in la karbaasho dhammaanba kuwo dilka lagu xukumo. Karbaashitaankuna waxa uu ahaa fal aad u xun oo kuwo badan noloshooda ka takhalusay. Haddaba waxay u muuqataa in Bilaatos arrintan u sameeyay si Yuhuuddu ugu naxariistaan Ciise oo loo sii daayo (Luukos 23:16, 22; Yooxanaa 19:12). Waxaana laga yaabaa in tani ahayd waxsii sheegistii Ishacyaah 53:5 oo dhabawday.

Karbaashitaanka Roomaanku aad buu u xanuun badnaa, waxaanu ciqaabitaan u ahaa kuwa aan Roomaanka ahayn. usha garaacitaanku wuxuu ka samaysnaa macdan iyo lafo xagga danbe lagaga xidhay iyadoo qofkana lagu garaaci jiray, isaga oo gacmaha ka xidhan dhabarkana u foorara. Haddaba karbaashitaanka waxa la samayn jiray ka hor intaan qofka isku tallaabta lagu qodbin (Livy XXXIII:36).

Injiilku erayo kala duwan ayuu u adeegsanayaa sheegitaanka karbaashitaankii Roomaanka

1. Matayos 27:26; Markos 15:15 – *phragelloō*, in la garaaco
2. Luukos 23:16, 22 – *paideuō*, asal ahaan ciyaalkoo la edbiyo (Cibraaniyada 12:6-7, 10), laakiin halkan 2 Korintos 6:9. Waa garaacitaan
3. Yooxanaa 19:1 – *mastigoō*, asal ahaan waa magaca garaacitaanka, Matayos 10:17; 20:19; 23:34; Falimaha Rasuullada 22:24-25; Cibraaniyada 11:36

Waxa dhici karta inay isku wada mid yihiin ama inay tilmaamayaan labo karbaashitaan

- a. Garaacitaan yar oo ka ahaaday Bilaatos
- b. Garaacitaanka ka horreeyay isku tallaab ku qodbista.

19:2 “Askartiina taaj ayay qodxan uga taxeen, oo madaxiisay saareen” waxa uu ahaa nooc ka mid ah jidh dilka, iyadoo qodxo madaxa iyo dhabannada Ciise lagaga taagay, sidoo kalena waxa suurto gal ah in taajkani uu koobsanayay waraaqo iyadoo Ciise loogu dheel dheelayay boqor ahaan (Matayos 27:27-31; Markos 15:15-20).

Erayga Giriigga ah “taaj” (*stephanos*) waxa loo adeegsaday iyadoo tusinaysa ciyaartoy guuleystay ama waa koofiyadda boqorradu madaxa saartaan.

▣ **“waxay u geliyeen dhar guduudan.”** Midabka casaanku (*porphyros*) wuxuu ahaa calaamadda boqortooyada, iyadoo laga samayn jiray dun qaali ah. askarta Roomaankuna waxay xidhan jireen dhar guduudan (Markos 15:17, 20) oo midabkoodana waxa laga soo saari jiray dirxi gala geedka looxa laga sameeyo. Marada Ciise waxa ay tusinaysay maro boqortooyo, laakiinse xaqiiqa ahaantii wuxuun bay ahayd maro uu lahaa askari Roomaan ahi (Matayos 27:18).

19:3

NASB “Markaasay u yimaadeen oo ku yidhaahdeen,”

NKJV “kaddib waxay yidhaahdeen”

NRSV “way u imanayeen iyagoo leh”

TEV “way u yimaaddeen oo yidhaahdeen”

NJB “way u imanayeen oo lahaayeen”

Waa ficillo aan dhammays tirnayn. Waxa muuqata in askartu si joogto ah u samaynaayeen. Dheel dheelitaanku wuxuu ahaa midaan ahayn oo keliya Ciise balse Yuhuudda u ah yasitaan, waxaana suurto gal ah in Bilaatos uu doonayay, inay u naxariistaa Ciise, taasina waxba way tari wayday.

▣ **“wayna dharbaaxeen.”** Eraygani asal ahaan waa “ul ku garaacis,” laakiinse mardanbe waxa loo adeegsaday “dharbaaxada gacanta.” Waxa laga yaabaa in middani ahayd nooc kale oo dheeldheelitaan ah, iyadoo weji ka garaacis ahayd.

19:4

NASB “inaanan eed ku helin.”

NKJV “wax denbi ah kumaan helin”

NRSV “wax eeda kuma helin”

TEV “maan ku helin wax aan ku xukumo”

NJB “wax eeda isaga kumaan helin”

Ujeedooyink Yooxanaa waxa ka mid ahayd in uu caddeeyo Masiixiyidda oon wax caga juglayn ah aan marnaba ku samaynayn xukuummadda Roomaanka ama masuuliyiinteeda. Waxa uu marar badan Yooxanaa sheegayaa Bilaatos oo isku dayay inuu sii daayo Ciise (18:38; 19:6; Luukos 23:4, 14, 22).

19:5

NASB, NKJV “Bal eega ninka”

TEV, NET “eega waakan ninkani”

NRSV, NJB, REB “waa kan ninkii”

Waxa jiray siyaabo dhowra oo loo fahmay ereyadan

1. Ciise oo u labisnaa boqor lagu majaajiloonayo
2. Ciise sida loo garaacay oo il naxariis leh lagu eegi karayay
3. Iyadoo tilmaamaysa Sekaryaah 6:12
4. Iyadoo sheegaysa Ciise aadananimadiisa
5. Iyadoo la xidhiidha Aramaatiga “wiilka aadanaha,” *bar nash* [\[a\]](#),

19:6 “ayay qayliyeen iyagoo leh, Iskutallaabta ku qodob, iskutallaabta ku qodob” sababta hogaamiyayaasha diintu u rabeen in Ciise iskutallaabtaa lagu qodbaayi, waxay ahayd inay dhabowdo habaarka ku sugan Sharciga Kunoqoshadiisa 21:23. Waxaana laga yaabaa tani inay ahayd sababta Bawlos markii hore uga shakiyay Ciise inuu Yahay Masiixa Ilaah, laakiinse Galatiya 3:13 waxa aan ka arkaynaa, Ciise oo inkaarteenna ugu dhintay iskutallaabtaa (Kolosay 2:14).

▣ **“anigu eed kuma aan heline”** Bilaatos saddex jeer ayuu sidan yidhi (18:38; 19:4).

19:7 “waa inuu dhinto, waayo, wuxuu iska dhigay Wiilka Ilaah” Ciise waxa uu sheegay inuu Ilaah la mid yahay iyo inuu yahay Wiilka Ilaah, shakina kuma jiro Yuhuuddii maqashay inuu u fahmeen isagoo Ilaahnimo sheeganaya (5:18; 8:53-59; 10:33). Tuhunka runta ah ee Yuhuuddu ay Ciise ku eedeeyeenna wuxuu ahaa inuu sheegtay Ilaahnimo (Matayos 20:6, 65), ciqaabka arrintanina waxa uu ahaa in dhagax lagu dilo qofka sameeya sidaas (Laawiyiintii 24:16). Haddii Ciise aanu jidh soo qaadan, Ilaahnimo hore u jirtayna lahayn, waxa ay ahayd in dhagax lagu dilo!

NASB (UPDATED) TEXT: 19:8-12

⁸Haddaba Bilaatos markuu hadalkaas maqlay, aad buu u sii baqay, ⁹oo haddana wuxuu galay guriga taliyaha oo ku yidhi Ciise, Xaggee baad ka timid? Laakiin Ciise jawaabna uma uu celinin. ¹⁰Sidaa daraaddeed Bilaatos ayaa ku yidhi, Miyaanad ila hadlayn? Miyaanad ogayn inaan leeyahay amar aan kugu sii daayo iyo amar aan iskutallaabta kugu qodbo? ¹¹Ciise ayaa ugu jawaabay, Amarna iguma aad lahaateen haddaan xagga sare lagaa siin. Sidaa daraaddeed kii ii soo kaa gacan geliyey ayaa kaa dembi weyn. ¹²Taas dabadeed Bilaatos wuxuu doonayay inuu sii daayo, laakiin Yuhuuddii ayaa qaylisay iyagoo leh, Haddaad ninkan sii daysid, Kaysar saaxiibkiis ma ihid. Nin kasta oo boqor iska dhigaba, wuxuu caasiyaa Kaysar.

19:8 “Bilaatos markuu hadalkaas maqlay, aad buu u sii baqay” Bilaatos naagtiisa ayaa uga digtay Ciise (Matayos 27:19) Yuhuudduna imika waxay sheegayeen isagoo sheegtay Wiilka Ilaah inuu yahay. Bilaatos markaas isaga oo rumaysnaa khuraafaad ayuu cabsaday, waayo wakhtigaas waxa jirtay inay dadku rumaysnayeen ilaahyada oo dad iskasoo dhiga.

19:9

NASB, NKJV, NRSV

“Xaggee baad ka timid?”

TEV, NJB, NIV

“halkee baad ka timid?”

Bilaatos Ciise ma waydiinayo magaalada uu kasoo jeedo laakiin wuxuu waydiinayay asalkiisa, waxaanu dareemay muhiimadda uu yeelan karo qofkan isaga hor jooga. Ciise hadalkii Bilaatos ee ku sugnaa 18:38 waxa uu ka fahmay isagoon runta xiisaynayn, balse siyaasadda danaynaya, sidaasi darteedna uma aanu jawaabin.

Bilaatos waxa uu kusoo biiray dadkii Ciise ka yaabay balse aan fahmin asalkiisa (4:12; 6:42; 7:27-28, 41-42; 8:14; 9:29-30) tanina waxa ay ka mid tahay qaabka Yooxanaa qoraalkiisa u adeegsanayo. Ciise waxa uu ka ahaaday samada, sidaasi darteedna kuwa xagga hoose ka ahaaday ma fahmi karaan haddii aanu iyaga Aabbuhu taabanin (6:44, 65; 10:29).

☐ **“Ciise jawaabna uma uu celinin”** Bilaatos waxa laga yaabaa inuu xasuustay jawaabtii Ciise (18:37)! Qaar ayaana u arka in tani ahayd dhammaystirka Ishacyaah 53:7.

19:11 “Amarna iguma aad lahaateen haddaan xagga sare lagaa siin” waa jumlad shuruudeed heerka labaad ah. Ciise kamuu argagixin Bilaatos, maxaa yeelay wuu garanayay cidda uu yahay iyo ujeedada uu u yimid! Kitaabkuna wuxuu inoo sheegayaa in Ilaah uu yahay midka ka danbeeya dhammaanba awoodda aadanaha (Rooma 13:1-7).

☐ **“kii ii soo kaa gacan geliyey ayaa kaa dembi weyn”** waxa ay u muuqataa in loogala jeedo Yuudas Iskariyod (6:64, 71; 13:11), laakiin mufasiriint badankoodu waxay rumaysan yihiin inuu yahay Kayafas, oo Ciise rasmi ahaan ugu gacan geliyay Roomaanka. Waxa suurto gala in ereyadani ay tilmaamayaan (1) hogaamiyayaashii sharciga ee Yuhuudda ama (2) gebi ahaanba ummadda Yuhuudda (Matayos 21:33-46; Markos 12:1-12; Luukos 20:9-19; Rooma 9-11).

19:12 “Bilaatos wuxuu doonayay inuu sii daayo,” waa fal aan dhammays tirnayn oo tilmaamaya fal tegay oo soo laablaabanaya. Bilaatos marar badan ayuu isku dayay inuu sii daayo Ciise.

☐ **“Haddaad ninkan sii daysid, Kaysar saaxiibkiis ma ihid”** waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah oo faa’idaynasa suurto galnimada. Hogaamiyayaashii Yuhuuddu waxay Bilaatos ugu hanjabeen inay

hogaamiyayaashiisa uga dacwoon doonaan, waa haddii aanu samaynin doonistooda oo ah inuu Ciise dil ku xukumo. Erayada ah “Kaysar saaxiibkiis” waxa uu ahaa magac tilmaamayay dad gaara oo Boqortooyada Roomaanka ah (waxa uu la bilaabay Augustus ama Vespasian). Erayga “Kaysar” waxa uu tilmaamayaa Boqorka Roomaanka, waxaanay u noqonaysaa wakhtigii Julius Caesar, waxaana dhaqan geliyay Augustus.

NASB (UPDATED) TEXT: 19:13-16

¹³Haddaba Bilaatos markuu hadalladaas maqlay. ayuu Ciise dibadda u soo saaray, oo wuxuu ku fadhiistay kursiga xukumaadda, meesha la yidhaahdo Sallaxa Dhagaxa ah oo af Cibraanigana lagu yidhaahdo Gabbata. ¹⁴Haddaba waxay ahayd Maalintii Diyaargarayskii Kor maridda, abbaaraha saacaddii lixaad. Oo wuxuu Yuhuudda ku yidhi, Bal eega boqorkiinna. ¹⁵Sidaa daraaddeed waxay ku qayliyeen, Kaxee, kaxee, iskutallaabta ku qodob. Markaasaa Bilaatos wuxuu ku yidhi. Boqorkiinna miyaan iskutallaabta ku qodbaa? Wadaaddadii sare ayaa ugu jawaabay. Boqor ma lihin Kaysar maahee. ¹⁶Markaasuu haddaba u dhiibay in iskutallaabta lagu qodbo.

19:13 “Bilaatos markuu hadalladaas maqlay. ayuu Ciise dibadda u soo saaray, oo wuxuu ku fadhiistay kursiga xukumaadda,” qoraalka kama muuqanayso cidda ku fadhiistay kursiga xukumaaddu. Williams iyo Goodspeed ayaa rumaysan in Ciise uu ahaa kii ku fadhiistay kursiga iyadoo loogu dheeldheelayo inuu Yahay boqorka Yuhuudda, laakiin waxa qoraalku xoojinayaa in Bilaatos uu ahaa ka kursiga ku fadhiistay.

NASB, NKJV, NJB “meesha la yidhaahdo Sallaxa Dhagaxa ah oo af Cibraanigana lagu yidhaahdo Gabbata.”

NRSV “la yidhaahdo Sallaxa Dhagaxa, ama af Cibraaniga Gabbata”

TEV “la yidhaahdo Sallaxa Dhagaxa (af Cibraanigana magacu waa ‘Gabbata’)”

Adeegsiga erayada Cibraaniga ahi iyo Aramaatigu iyadoo la sharxayaa waxa ay tusinayaa in Yooxanaa Injiilkiisa uu u qorayay kuwa aan Yuhuudda ahayn (aayadda 17). Sallaxa Dhagaxu waxa uu ahaa meesha xukunka lagaga dhawaaqi jiray, iyadoo erayga Aramaatiga ah ee *Gabbatha* isna uu yahay “dhagaxyada sarreeya.”

19:14 “waxay ahayd Maalintii Diyaargarayskii Kor maridda” waxa muuqata iyada oo Injiillada kale ay sheegayaan inuu Ciise wax kala cunay cuntada Kormarista intii aan la xidhin ka hor, laakiin Yooxanaa waxa uu sheegayaa inay ahayd maalintii Diyaargarayska Kormarista. Eeg fiirada 18:28.

☐ **“abbaaraha saacaddii lixaad”** maxkamadayntii iyo iskutallaab ku qodbistii Ciise ee Bilaatos hortisu waxay ahayd sidan:

	<u>Matayos</u>	<u>Markos</u>	<u>Luukos</u>	<u>Yooxanaa</u>
Xukunkii Bilaatos				lixdii 19:14
Iskutallaab ku qodbistii		Saddexdii 15:25		
Mugdiggii	6dii-9kii 27:45	6dii-9kii 15:33	6dii-9kii 23:44	
Qaylintii Ciise	Sagaalkii 27:46	Sagaalkii 15:34		

Labo waxyaalood ayaa soo baxaya marka aan wakhtiyadan is barbar dhigno:

1. Waa isku mid laakiin Yooxanaa waxa uu adeegsaday goorsheegto Roomaanka isaga oo ka bilaabaya 12:00 a.m. (Gleason L. Archer, *Encyclopedia of Bible Difficulties*, p. 364), halka qorayaasha Injiillada kale ka adeegsadeen goor sheegta Yuhuudda oo ka bilaabanaysa 6:00 a.m.
2. Yooxanaa goor danbe ayuu ku sheegayaa iskutallaab ku qodbistii Masiixa marka loo eego Injiillada kale, waxaana weeyi tusaale kale oo ah farqiga u dhexeeya Yooxanaa iyo Injiillada kale.

Waxa ay u muuqataa laga bilaabo Yooxanaa 1:39 iyo 4:6 inuu Yooxanaa adeegsanayo goorsheegta Yuhuudda oonu adeegsanayn ta Roomaanka (M. R. Vincent, *Word Studies*, Vol, p. 403).

Waxa suuro gal ah in kala duwanaanshaha wakhtiga ee Injiilladu la xidhiidhi karo

1. Wakhtigii maalintaa ahaa ee qurbaanka lagu samayn jiray Macbadka (9 a.m. iyo 3 p.m. Falimaha Rasuullada 2:15; 3:1)
2. Dhinaca kale iyadoo asal ahaan gelinka danbe la qali jiray Wanka Kormarista 14 Niisaan.

Kitaabka Quduuska ahi waxa uu ka ahaaday Bariga Soke, ujeedadiisuna maaha inuu wakhtiga habeeyo sida ay sameeyaan taariikhyahannada reer galbeedka ee casriga ahi.

▣ **“Bal eega boqorkiinna”** halka ay aayadda 5 kala xidhiidho Sekaryaah 6:12, erayadanina waxay la xidhiidhaan Sekaryaah 9:9 (eeg F. F. Bruce, *Answers to Questions*, p. 72).

19:14 weedha koobaad waa faallada qoraaga.

19:15 “Kaxee, kaxee, iskutallaabta ku qodob.” Aayaddan dhexdeeda waxa ku jira saddex ficil oo amar ah kuna dhisan garasho. Asalka erayada “Iskutallaabta ku qodob” waxa loogala jeedi karaa “korraysii” ama “sarraysii” waxaana laga yaabaa inay tahay qaabka Yooxanaa u adeegsanayo erayo labo macne xambaarsan (3:14; 8:28; 12:32).

▣ **“Wadaaddadii sare ayaa ugu jawaabay. Boqor ma lihin Kaysar maahee.”** Waa iska hor imaad la yaab leh! denbiga caydu waxa uu ahaa denbiga hogaamiyayaasha diinta, waana wixii ay ku tuhmeen Ciise in isku tallaabta lagu qodbo. Axdiga Hore dhexdiisana Ilaah oo keliya ayaa boqorka dadka ah (1 Samuu’eel 8).

19:16 “iyaga” eraygan magac u yaalka ahi waxa uu tilmaamayaa askartii Roomaanka sida ku sugan Matayos 27:26-27 iyo Markos 15:15-16, laakiin Yooxanaa waxa laga yabaa in loogala jeedo Bilaatos oo Ciise u dhiibay in iskutallaabta lagu qodbo isaga oo fulinaya doonista hogaamiyayaasha Yuhuudda.

NASB (UPDATED) TEXT: 19:17-22

¹⁷na kaxeeyeen Ciise. Markaas isagoo sita iskutallaabta ayuu u kacay meeshii Dhakada la yidhaahdo. oo af Cibraaniga lagu odhan jiray Golgota. ¹⁸meeshaasay iskutallaabaha ku qodbeen isaga iyo laba kale, midba gees. Ciisena dhexda. ¹⁹Bilaatosna wax buu qoray oo ku dhejiyey iskutallaabta dusheeda, waxaana ku qorraa. **CIISIHII REER NAASARET. BOQORKA YUHUUDDA.** ²⁰Haddaba Yuhuudda badideed ayaa qorniinkaas akhriday. waayo. meeshii Ciise iskutallaabta lagaga qodbay waa u dhowayd magaalada. oo qorniinkii wuxuu ku qorraa af Cibraaniga iyo af Roomaaniga iyo af Gariigga. ²¹Sidaa daraaddeed wadaaddadii sare oo Yuhuudda waxay Bilaatos ku yidhaahdeen. Ha qorin. Boqorka Yuhuudda, laakiin qor, Kanaa yidhi. Waxaan ahay Boqorka Yuhuudda. ²²Bilaatos ayaa ugu jawaabay. Waxaan qoray ayaan qoray.

19:17 “isagoo sita iskutallaabta” si sax ah u garan mayno qaabka ay lahayd iskutallaabta Falastiin dhexdeedu qarnigii koobaad, waxaanu noqon karaa sida xarafka T wayn ama t yar ama X. Sida uu doonaba ha ahaadee maxbuusku waxay ahayd inuu wax ka qaado isku tallaabtiisa ilaa la gaadhsiiyayo meeshii lagu qodbi lahaa (Matayos 27:22; Markos 15:21; Luukos 14:27; 23:26).

▣ **“meeshii Dhakada la yidhaahdo. oo af Cibraaniga lagu odhan jiray Golgota”** lama hubo macnaha ereyadan, maxaa yeelay erayga Cibraaniga/Aramaatiga ahi ma tilmaamayo taag sida dhakada oo kale ah, laakiinse waa taag hooseeya oo u dhow Yeruusaalem. Roomaanku iskutallaabta waxay saari jireen meel taag ah oo muuqata. Haddaba cilmiga arkiyoolojiga ama raadintii waxyaalihii hore ma garanayo meesha ay ahayd halkii

iskutallaabta lagu qotomiyay, waxaana hubaala inay ahayd meel ka baxsan Yerusaaalem. Ciisena waxa lagu dilay meel dadka oo dhan u muuqata!

19:18 “meeshaasay iskutallaabaha ku qodbeen” Injiilladu ma faahfaahinayaan iskutallaabtii Roomaanka. Fikirka iskutallaab ku qodbistana Roomaanku waxa ay ka keeneen Kartajiniyaaniska oo iyaguna ka keenay Aasiya. Inkata oynaan garanayn siday iskutallaabtu u ekayd, hadana waxa aan ogsoonahay inuu ahaa ciqaab xun iyo dhimasho xanuun badan oo gaabis ah, waxaana qofka iskutallaabta lagu qodbayo la marsiin jiray ciqaab kala duwan, qofkuna wuxuu u dhiman jiray deldelis.

▣ **“laba kale,”** waa dhaboobitaanka waxsii sheegistii Ishacyaah 53:9 sida ku qoran Matayos 27:38; Markos 15:27; iyo Luukos 23:33.

19:19 “Bilaatosna wax buu qoray” waxa laga yaabaa in Bilaatos uu qoraalkan sameeyay oo kaddibna mid kale ku qoray loox. Matayos ayaa waxa uu sheegayaa in waxa meesha lagu qoray uu ahaa tuhunkii Ciise loo soo jeediyay “ashkatadii” (*aitian*, Matayos 27:37), halka Markos iyo Luukos ay ka adeegsanayaan inuu ahaa cinwaan (*epigraphe*, Markos 15:26; Luukos 23:28).

19:20 “wuxuu ku qorraa af Cibraaniga iyo af Roomaaniga iyo af Gariigga” “Cibraani” waxay sheegaysaa Aramaatiga (5:2; 19:13, 17; 20:16; Josephus, *Antiq.* 2.13.1). Waxa fiican in aan aragno afarta Injiil erayada aya dhigayaan:

1. Matayos 27:37 – “KANU WAA CIISE BOQORKA YUHUUDDA.”
2. Markos 15:26 – “BOQORKA YUHUUDDA.”
3. Luukos 23:38 – “KANU WAA BOQORKA YUHUUDDA”
4. Yooxanaa 19:19 – “CIISIHI REER NAASARET. BOQORKA YUHUUDDA”

Waxa jira kala duwanaansho u dhexeeya Injiillada, laakiin ujeedadu waa isku mid, arrintanina waxay la xidhiidhaa kala duwanaanshaha faahfaahinta taariikh ahaaneed ee aan ka helayno Injiillada. Qoraal kastaa wuxuu si gaara u qoray si xoogaa ka yara gedisan kuwa kale, laakiin dhammaantood waxay qoreen markhaatibay u ahaayeen. Bilaatos wuxuu rabay inuu Yuhuudda ka cadhaysiiyo isaga oo ku dul qoray magacii ay uga cabsadeen iskutallaab ku qodbista Ciise (aayadaha 21-22).

19:22 “Waxaan qoray ayaan qoray.” Waa labo fal oo dhammays tiran, isla markaana tusinaya dhammays tirka wixii la qoray.

NASB (UPDATED) TEXT: 19:23-25a

²³Haddaba askartii markay Ciise iskutallaabta ku qodbeen. dharkiisay qaateen oo ay afar meelood ka dhigeen, askari waliba meel buu qaatay, khamiiskiina qaateen. Khamiiskii meella kama tolaln dusha iyo hoosta. ²⁴Sidaa daraaddeed waxay isku yidhaahdeen, Yaynaan kala jeexin, laakiin aan u saami ridanno kii heli doona, inuu noqdo Qorniinka oo leh, Iyagu waxay qaybsadeen dharkaygii, Khamiiskaygiina u saami riteen. ²⁵Haddaba waxyaalahaas askartii way samaysay.

19:23 “oo ay afar meelood ka dhigeen, askari waliba meel buu qaatay” askarta waxay qaateen dharkii Ciise, waana go’iisii. Garan mayno sida dharka Ciise loogu qaybiyay afar qaybood, waxaana laga yaabaa inay ahaayeen, kabiiisii, hagoogtii, suunkii iyo go’iisii. Sidoo kale garan mayno inuu cumaamad madaxa ku duubnaa Ciise. Yuhuudda dhexdeedana qaawanaanta waxa ay ka ahayd ceeb. Tani haddaba waa dhammaystirka wixii kusoo arooray (Sabuurka 22:18) oo lagusoo xigtay aayadda 24.

▣ **“khamiiskiina”** waxa loogala jeedaa go’iisii jamac ahaanna waxa loo adeegsadaa *himatia*. Ka la xidho isna waxa lagu magacaabaa (*chiton*), farqiga u dhexeeyana waxa laga arki karaa Matayos 5:40 iyo Luukos 6:29 waxaana samaysay Dorkos (Falimaha Rasuullada 9:39). Waxa kaloo intaas dheerayd in Yuhuuddii qarnigii koobaad ay xidhan jireen dhar hoosaad asturaad ah.

Erayada ugu danbeeya aayadda 23 waa faallo kale oo qoraaga bixinayo.

▣ **“Khamiiskii meella kama tolays dusha iyo hoosta”** waxa laga yaabaa in ay leedahay muhiimad fiqi ahaaneed. Khamiiska noocan ahi wuxuu ahaa qaali. Waxa ay haddaba u muuqataa in ay ka baxsantahay dabeecaddii Ciise oo ahayd caadi ahaan in aanu xidhan jirin maryo qaali ah. Josephus (*Antiq.* 3.7.4), waxa aan ka garan karnaa in Wadaadka Sare uu xidhan jiray kan oo kale, isaga oo dhaqan ahaan rabbaaniyiinyu ku tilmaami jireen Muuse oo sidaas yeeli jiray. Waxa ay middani haddaba ka dhigi karaysay Ciise oo ah

1. Wadaadka Sare (Cibraaniyada)
2. Sharci dejiyaha cusub

Labo macna yeelashadu hadiyo goor waxay caan ku tahay Injiilka Yooxanaa, laakiin mufasiriintu waan inay ka digtoonaadaan faahfaahinta arrintan.

19:24 “inuu noqdo Qorniinka” Sabuurka 22 oo Axdiga Hore kusii sheegay iskutallaab ku qodbista.

1. Sabuurka 22:12 – Matayos 27:64; Markos 15:34
2. Sabuurka 22:7-8 – Matayos 27:39, 43; Markos 15:29; Luukos 23:35
3. Sabuurka 22:15 – Matayos 27:48; Markos 15:36; Luukos 23:36; Yooxanaa 19:28, 29
4. Sabuurka 22:16 – Matayos 27:35; Markos 15:24; Yooxanaa 20:25
5. Sabuurka 22:18 – Matayos 27:35; Markos 15:24; Luukos 23:34; Yooxanaa 19:24
6. Sabuurka 22:27-28 – Matayos 27:54; Markos 15:39; Luukos 23:47; (Yooxanaa 20:31; Matayos 28:18-20; Luukos 24:46-47; Falimaha Rasuullada 1:8)

NASB (UPDATED) TEXT: 19:25b-27

^{25b}Waxaa Ciise iskutallaabtiisa ag taagnaa hooyadiis, iyo habaryartiis, Maryan afadii Kaloobaas, iyo Maryan tii reer Magdala. ²⁶Sidaa daraaddeed Ciise markuu arkay hooyadiis iyo kii xerta ahaa oo uu jeclaa oo ag taagan, ayuu hooyadiis ku yidhi, Islaan yahay, waa kaa wiilkaagii. ²⁷Markaasuu kii xerta ahaana ku yidhi. Waa taa hooyadaa. Oo saacaddaas dabadeed kii xerta ahaa ayaa gurigiisii u kaxeeyey.

19:25 “Waxaa Ciise iskutallaabtiisa ag taagnaa hooyadiis, iyo habaryartiis, Maryan afadii Kaloobaas, iyo Maryan tii reer Magdala” waxa in badan lagu doodaa haddii magacyada dumarku yihiin afar ama saddex. Waxa la xoojinayaa in afar haweenaa magacyadood ay yihiin, maxaa yeelay suurto gal maaha in magac Maryan labo walaalo ah loogu wada yeedho. Maryan walaasheed waxa la odhan jiray Saloome sida ku sugan Markos 15:40 iyo Matayos 27:56, taasina waxa ay ka dhigantahay in Yacquub, Yooxanaa, iyo Ciise ay ahaayeen habro wadaag. Dhaqankii qarnigii labaad (*Hegesippus*) ayaa sheegaya in Kolobas uu ahaa Yuusuf walaalkiis. Maryantii reer Magdalana waxay ahayd tii Ciise uu ka saaray todobada Shaydaan, waxaanay ahayd qofkii u horreeyay ee aragtay Ciise markuu dhimashada kasoo sara kacay (20:1-2; 11-18; Markos 16:1; Luukos 24:1-10)

MAWDUUC GAAR AH: DUMARKII CIISE RAACAY

- A. Sheegitaanka dumarkii Ciise Raacay ugu horrayn waxay kusoo aroorayaan Kuukos 8:1-3.
 1. Maryantii reer Magdala (aayadda 2)
 - a. Matayos 27:56,61; 28:1
 - b. Markos 15:40,47; 16:1,9
 - c. Luukos 8:2; 24:10
 - d. Yooxanaa 19:25; 20:1,11,16,18
 2. Yo’anna, oo ahayd xaaskii Khusas (adeegihii Herodos, aayadda 3) sidoo kale waxay ku qorantahay Luukos 24:10
 3. Susanna (aayadda 3)
 4. “iyo qaar badan oo kale oo waxooda ugu adeegi jiray” (aayadda 3)
- B. Dumar joogay goobtii ku qodbitaanka iskutallaabtaa
 1. Liiska Matayos
 - a. Maryantii reer Magdala (27:56)
 - b. Maryantii ahayd Yacquub iyo Josephus hooyadood (27:56)
 - c. Hooyadii ilma Sebede (27:56)
 2. Liiska Markos

- a. Maryantii reer Magdala (25:40)
- b. Maryantii ahayd Yacquub iyo Joses hooyadood (15:40)
- c. Saloome (15:40)
- 3. Luukos wuxuu leeyahay “dumarkii kasoo raacay Galiili” (23:49)
- 4. Liiska Yooxanaa
 - a. Maryan, Ciise hooyadiis (19:25)
 - b. Habaryartiis (19:25)
 - c. Maryantii Kaloobaas [KJ Kaloobas, waxa ay noqon kartaa afadiisa ama inantiisa] (19:25)
 - d. Maryantii reer Magdala (19:25)
- C. Koox haweenaa oo eegayay meesha lagu aasayo Ciise
 - 1. Liiska Matayos
 - a. Maryantii reer Magdala (27:61)
 - b. Maryantii kale (27:61)
 - 2. Liiska Markos
 - a. Maryantii Magdala (15:47)
 - b. Maryantii ahayd Joses hooyadii (15:47)
 - 3. Luukos wuxuu leeyahay “dumarkii kasoo raacay Galiili” (23:55)
 - 4. Yooxanaa muu diiwaan gelin dumarkii xabaasha eegayay
- D. Haween subaxnimadii Axadda yimid xabaasha
 - 1. Liiska Matayos
 - a. Maryantii Magdala (28:1)
 - b. Maryantii kale (28:1)
 - 2. Liiska Markos
 - a. Maryantii Magdala (16:1)
 - b. Maryan, Yacquub hooyadiis (16:1)
 - c. Saloome (16:1)
 - 3. Liiska Luukos
 - a. “xabaashay yimaaddeen” (24:1-5,24)
 - (1) Maryantii Magdala (24:10)
 - (2) Yo’anna (24:10)
 - (3) Maryan, Yacquub hooyadiis (20:1,11)
 - 4. Yooxanaa wuxuu qorayaa oo keliya Maryantii Magdala
- E. Dumarkii joogay qolladdii sare (Falimaha Rasuullada 1:14)
 - 1. “dumarkii” (1:14)
 - 2. Maryan, Ciise hooyadiis (1:14)
- F. Garan mayno xidhiidhkii ka dhexeeyay haweenkan, waxaana muuqata in liisaskan badankooda ay hoggaaminayso Maryantii Magdala. Maqaal fiican oo ah “dumar” ku sugnaa Ciise noloshiisii iyo adeegitaankiisii, lagana helayo *Dictionary of Jesus and the Gospels*, IVP, pp. 880-886.

19:26 “kii xerta ahaa oo uu jeclaa” maadaama oo Yooxanaa Injiilkiisa aanu magaciisa ku sheegayn, waxa kuwo badani kasoo qaadeen inuu sidan isu muujinayay (13:23; 19:26; 21:7, 20). Aayadahan oo dhan Yooxanaa waxa uu ku adeegsanayaa *agapaō*, laakiin 20:2 waxa uu ku adeegsanayaa erayga ah *phileo*. Wakhtigii Yooxanaana labadan eray isku mid bay ahaayeen; isu eeg 3:55, *agapaō* iyo 5:20, *phileo*, labadubana waxa ay sheegayaan jacaylka Aabbuhu u qabo Wiilka.

19:27 “saacaddaas dabadeed kii xerta ahaa ayaa gurigiisii u kaxeeyey” loogalama jeedo in markiiba Yooxanaa uu Maryan gurigiisa u kexeeyay, laakiin waxa ay noqon kartaa inay ka dhalatay magaca Ciise hooyadiis oon lagu sheegay Matayos 27:56 iyo Markos 15:40. Dhaqan ahaan waxa la inoo sheegayaa in Yooxanaa uu Maryan daryeelayay ilaa ay ka dhimatay, kaddibna wuxuu tegay Aasiyada Yar (gaar ahaan Efesos) halkaasoo uu ka adeegay. Yooxanaa Injiilka sababtuu u qorayna waxa ay noqon kartaa iyadoo odayaashii kaniisaddii Efesos ay ka dalbadeen inuu qoro.

NASB (UPDATED) TEXT: 19:28-30

²⁸Markaas dabadeed Ciise isagoo garanaya wax kasta inay dhammaadeen, in Qorniinku ahaado, ayuu yidhi, Waan harraadsanahay. ²⁹Markaas waxaa meeshaas yiil weel khal ka buuxo. Sidaa daraaddeed geed isbonji la yidhaahdo bay khalkii ka buuxiyeen, markaasay kor saareen geed husob la yidhaahdo oo afkiisa ku dhoweeyeen. ³⁰Haddaba markii Ciise khalkii qaatay ayuu yidhi, Waa dhammaatay, markaasuu madaxa foororshay oo ruuxii bixiyey.

19:28 “Ciise isagoo garanaya wax kasta inay dhammaadeen, in Qorniinku ahaado, ayuu yidhi, Waan harraadsanahay.” Waxaan lahubin qaab dhismeedka weedha Giriigga ah “in Qorniinku ahaado” inay tilmaamayso “waan harraadanahay” mise “waxkasta waa la dhammays tiray.” Fahanka asalka ahi waxa uu noqonayaa “waan harraadanahay” waana dhammaystirka waxsii sheegistii Sabuurka 69:21.

19:29 “waxaa meeshaas yiil weel khal ka buuxo” weelkani waxa uu meesha u yaallaybaa laga yaabaa askarta ama kuwa iskutallaabtaa lagu qodbay, dhaqan ahaanna waxa la siin jiray kuwa deldelan xoogaa khal ah si muddada deldelnaantoodu usii dheeraato.

▣ “weel khal” waxa uu ahaa cabitaanka dan yarta, una firso iyada oo Ciise aanu qaadanin khalka qadhaadh ee haweenka Yerusaleem ay siiyeen (Markos 15:23; Matayos 27:34), waxaana suurta gala sababta uu kan u aqbalay inay ahayd, si qorniinku ahaado Sabuurka 22:15.

▣ “kor saareen geed husob la yidhaahdo” qaar ayaa u arka in adeegsiga geedku uu calaamad u ahaa adeegga Kormarista (Baxniintii 12:22). Kuwo kalena waxay rumaysan yihiin in asalka erayga la adeegsaday uu toosinayo “ul” (NEB laakiin REB wuxu sheegayaa husob). Matayos 27:48 iyo Markos 15:36 waxay dhigayaan “caws duur.”

Sababaha loo diiday adeegsiga “husob” ayaa ah isaga oo ah geed gab, laakiinse waa inaan ogsoonaano iskutallaabtaa oo aan aad dhulka uga dheerayn, aragtideenna ah iskutallaab dheerna waxa ay noqonaysaa mid ku dhisan inagoo si qaldan u fahanna 3:14. Waxa laga yaabaa Ciise lugihii inaanay dhulka ka fogayn 20 ama 40 senti mitir dhulka korkiisa.

19:30 “Waa dhammaatay” waa fal dhammays tiran oo ku dhisan wax aan la garanayn tusmayna wada. Injiillada kale waxa ay inoo sheegayaan in Ciise ereyadan kor ugu dhawaaqay (Markos 15:37; Luukos 23:46; Matayos 27:50). Hadalkani waxa uu tilmaamayaa dhammays tirka muhiimadda madax furashada. Qaabka erayga (*telos*) ee babriga Masar (Moulton iyo Milligan) wuxuu tusinayaa macne ganacsi oo ah “lacagta sida buuxda loo bixiyay.”

▣ “markaasuu madaxa foororshay oo ruuxii bixiyey” erayga ah “madaxa foorarshay” waxa loo adeegsaday iyadoo la mida “wuu seexday.” Dhimashada Ciise isaga waxay u ahayd nabad geliyo. Waxay u muuqataa in dhimashadu inay kala soocayso ruuxa iyo jidhka, waxaanay u muuqataa joogitaan bilaa jidha oo u dhexeeya dhimashada iyo qiyaamaha (2 Korintos 5; 1 Tesaloniika 4:13-18, eeg William Hendriksen, *The Bible On the Life Hereafter*).

Markos 15:37 iyo Luukos 23:46 ayaan ka akhrin karnaa “ruuxii bixiyay.”erayga Cibraaniga ah ee “ruux” iyo “neef” waa isku mid. Neefsashadiisii u danbaysayna waxa ay ahayd ruuxiisa oo jidhkiisa ka tegay (Bilowgii 2:7).

NASB (UPDATED) TEXT: 19:31-37

³¹Sidaa daraaddeed Yuhuuddii, inaan meydadku sabtida iskutallaabaha sii saarnaan, waxay Bilaatos ka baryeen in lugaha laga jebiyo oo meydadka la qaado, waayo, waxay ahayd Maalintii Diyaargarayska, oo maalinta Sabtidaas waxay ahayd maalin weyn. ³²Haddaba askartii waa timid, oo ay lugaha ka jebiyeen kii hore iyo kii kale oo iskutallaabaha lagula qodbay isaga. ³³laakiin markay Ciise u yimaadeen oo ay arkeen inuu durba dhintay kama ay jebin lugihii. ³⁴laakiin mid askartii ka mid ah ayaa dhinaca Ciise waran kaga wareemay, oo markiiba waxaa ka soo baxay dhiig iyo biyo. ³⁵Oo kii arkayna wuu marag furay, maraggiisuna waa run, wuuna garanayaa inuu run sheegayo, inaad idinkuna rumaysataan. ³⁶Waayo, waxyaalahaas waxay u dhaceen inuu ahaado Qorniinka leh, Lafihisa midna la jebin maayo. ³⁷Oo Qorniin kale wuxuu leeyahay, arki doonaan kii ay wareemeen.

19:31 “inaan meydadku sabtida iskutallaabaha sii saarnaan” Yuhuuddu waxa ay danayn jireen in maydku aanu nijaasaynin dhulka (Sharciga Kunoqoshadiisa 21:23), gaar ahaan maalintaa Sabtida Kormarista.

- ▣ **“Sabtidaas waxay ahayd maalin weyn”** tani waxa ay sheegaysaa oo loo fasiray labo siyaabood
 1. Cuntada Kormarista ee sanadkaasi waxay ahayd Sabtidii (Yuhuuddu waxay adeegsan jireen tirsiga dayaxa)
 2. Ciidda oo kusoo hagaagtay maalin Sabti ah.Dabaal degga Ciidda Kormaristu waxa uu socon jiray (Baxniintii 12) siddeed cisho.

▣ **“lugaha laga jebiyo oo meydadka la qaado”** Caado ahaan kuwo iskutallaabtaa lagu qodbo lugahaa laga jebebin jiray si ay hore ugu dhintaan, maxaa yeelay lugaha oo la jebiyaa waxay u diidaysaa inay isku dayaan, inay qoriga ku tiirsadaan oo neefsadaan, waxaanay ahayd sababta ay badanaa u dhiman jireen dadku.

19:33 “oo ay arkeen inuu durba dhintay kama ay jebin lugihii” waa dhammays tirka wax sii sheegistii Baxniintii 12:46; Tirintii 9:12 iyo Sabuurka 34:20.

19:34 “mid askartii ka mid ah ayaa dhinaca Ciise waran kaga wareemay, oo markiiba waxaa ka soo baxay dhiig iyo biyo” tani waa markhaati furkii goob joogaha ahaa, waxayna taasi caddaynasaa dabiicadda aadananimada ee Ciise iyo inuu si runa u dhintay. Yooxanaa Injiilkiisa waxa uu u qorayay Gonostigii aqbalsanaa Ilaahnimada Ciise balse diidanaa aadananimadiisa. Qaar ayaa dhiigga iyo biyaha u fahmay baabtiisa iyo Cashada Rabbiga, laakiin maaha sidaas.

19:35 Aayaddani waa faallada Yooxanaa oo ahaa markhaati goob jooge ah u ahaa dhammaan dhacdooyinka (1) maxkamadayntii habeennimo; (2) maxkamadayntii Roomaanka iyo (3) iskutallaab ku qodbitaankii. Faallo ka bixintan dhimashada Ciise waxa ay la mid tahay 20:30-31, waxaanay tusinaysaa is barbar dhigga iyadoo ujeedadu tahay wacdinta Injiilka (21:24). Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8.

Falka danbe kuwo ka mida qoraal gacmeeyada Giriigga waxa uu ugu soo aroorayaa isagoo ah fal jooga, halka kuwo kalena uu ka yahay fal tegay. Haddii asalku uu yahay falka tegay waxa ay tilmaamaysaa kuwo aan rumaysadka lahayn sida 20:30-31. Sidoo kale haddii ay tahay falka jooga waxa ay tilmaamaysaa kusii socoshada rumaysadka iyo koritaankiisa. Waxaanay u muuqataa Injiilka Yooxanaa inuu labadan waxyaaloodba tilmaamayo.

▣ **“run...run”** eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55 iyo 17:3.

19:36 waxa tani ay tilmaami kartaa Wanka Kormarista ee Baxniintii 12:46; Tirintii 9:12; ama Sabuurka 34:20. Waxa aanay ku tiirsantahay erayada ay u noqonayso (1) wareemay ama (2) jebin. Ciise laftiisa ayaa kaniisaddii hore muddo afartan cisho ah u sharraxayay waxyaalahan ku sugan Axdiga Hore kaddib markuu soo sara kacay (Luukos 24:27; Falimaha Rasuullada 1:2-3). Wacdintii kaniisaddii hore (Falimaha Rasuullada) waxay xaqiijinaysaa Ciise oo buuxiyay waxsii sheegyadii Axdiga Hore.

19:37 kasoo xigashada Sekaryaah 12:10 ayaa ah ballan qaadyadii ugu waaweynaa ee

1. In Israa’iil ay rumayn doonaa Ciise Masiix (Muujintii 1:7)
2. Kuwo badan oo Yuhuuda ayaa rumeeyay oo ka murugooday dhimashada Ciise.
3. Tani waxay sheegaysaa askartii Roomaanka (Matayos 27:54) iyagoo metalaya ummaddii aan Yuhuudda ahayn (12:32).

Waxa in la xuso u baahan soo xigashadan oo ka ahaatay Masoretic Hebrew Text, mana aha Septujantiga oo caadi ahaan qoraayada Injiilku kasoo xigan jireen. Septujantigu waxa uu dhigayaa “dheel dheelis,” laakiin Masoreticu waxa uu dhigayaa “wareemay.”

NASB (UPDATED) TEXT: 19:38-42

³⁸Waxyaalahaas dabadeed, Yuusuf kii ahaa reer Arimataya, isagoo xer u ah Ciise laakiinse si qarsoon cabsidii uu ka cabsaday Yuhuudda aawadeed, wuxuu Bilaatos ka baryay inuu meydka Ciise qaado. Bilaatosna waa u fasaxay. Sidaa daraaddeed wuu yimid oo meydkiisii qaaday. ³⁹Oo waxaa kaloo yimid Nikodemos kii markii hore habeennimada u yimid, wuxuuna keenay malmal iyo cuud isku qasan oo qiyaastii boqol rodol ah. ⁴⁰Haddaba waxay qaadeen meydkiisii Ciise oo ku duudduubeen maryo iyo

dhir udgoon siday caadada aasniinta Yuhuuddu ahayd. ⁴¹Meeshii isaga iskutallaabta lagu qodbay waxaa ku tiil beer, beerta dhexdeedana waxaa ku tiil xabaal cusub oo aan ninna weli la dhigin. ⁴²Haddaba Maalintii Diyaargarayska oo Yuhuudda aawadeed ayay meeshaas Ciise u dhigeen, waayo, xabaashii waa dhowayd.

19:38-39 “Yuusuf...Nikodemos” waxay ahaayeen labo shakhsi oo hantiilayaal ah kana dhex shaqayn jiray Senhadriinka iyagoo xer qarsoon u ahaa Ciise, laakiinse wakhti khatar ah ayaa ay bannaanka isa soo dhigeen.

19:39 “wuxuuna keenay malmal iyo cuud isku qasan oo qiyaastii boqol rodol ah.” waxa ay ahaayeen cadarrada maydka la mariyo ee wakhtigaas. Sidoo kale waxyaalahani aad bay u badnaayeen taasina waxa ay tusinaysaa Ciise oo sida boqor oo kale loo aasay (2 Korintos 16:14). Eeg Mawduuca Gaarka ah 11:2.

Erayga Giriigga ah ee “qasan” (*migma*), waxa laga helayaa MSS P⁶⁶, κ^2 , A, D, L, iyadoo badanaa wadaaddadii kaniisaduhu u ugu beddeleen “xidhmo” (*eligma*) MSS a*, B, W, iyo qoraallada Qibtiga kuwo ka mida dhexdooda. UBS⁴ waxa uu ku dhigayaa “qasan” “B” da isagoo ku tirinaya (hubaal).

MAWDUUC GAAR AH: CADARRADA MAYDKA

- A. Myrth, foom udgoon oo laga soo saari jiray dhirta carabta
 - 1. Waxa uu kusoo arooray Axdiga Hore dhexdiisa 12 jeer, gaar ahaan kitaabyada xikmadaha
 - 2. Waxa uu ka mid ahaa hadiyadihii nimanka xikmadda lihi u keeneen Ciise markuu dhashay (Matayos 2:11)
 - 3. Waxa uu leeyahay macnayaal
 - a. Waxa loo adeegsaday “saliidda subkista ee quduuska ah” (Baxniintii 30:23-25)
 - b. Boqorka ayaa hadiyad ahaan loogu gayn jiray (Matayos 2:11)
 - c. Waxa loo adeegsaday aasitaankii Ciise (Yooxanaa 19:39 iyo isaga oo calaamad ah Yooxanaa 11:2). Waa marka loo eego caadooyinka Yuhuudda ee lagu sheegay Telmuudka (Berakhoth 53a).
- B. Aloes, nooc ka mida looxa cadarka ah
 - 1. Wuxuu la xidhiidhaa cadarka (Tirintii 24:6; Sabuurka 45:8; Maahmaayadii 7:17; Gabaygii Sulaymaan 4:14)
 - 2. Isagoo lagu daray Myrth ka ayaa Masaaridu u adeegsan jireen marinta maydka
 - 3. Nikodemos ayaa keenay in badan oo ka mida si loo mariyo maydka Ciise (Yooxanaa 19:39). Waa marka loo eego caadada Yuhuudda ee lagu sheegay Telmuudka (Betsah 6a).

19:40 “meydkii Ciise oo ku duudduubeen maryo iyo dhir udgoon siday” ujeedada waxyaalahani waxa ay ahayd inaanu (1) maydka urin iyo (2) in kafantu ay meesheeda haysato.

19:41 “Meeshii isaga iskutallaabta lagu qodbay waxaa ku tiil beer,” waxa muhiim ah inaan fahano dhakhsaha ay Yuusuf iyo Nikodemos u dhammays tireen shaqadooda. Ciise waxa uu dhintay 6:00 p.m. waxaanay ahayd in maydka xabaasha la geliyo 6:00 p.m., taasi oo ahayd inta aanay bilaabmin Sabtida Kormaristu ka hor.

▣ **“xabaal cusub oo aan ninna weli la dhigin.”** waa magaca fal sameeyaha ebyan ee aan la garanayn. Waxa aan ka ogaanaynaa Matayos 27:6 in xabaashani ahayd tii Yuusuf. Waxaana weeyi dhammays tirka waxsii sheegistii Ishacyaah 53:9 oo lagu soo xigtay Matayos 27:57.

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay askarku u karbaasheen oo ugu dheeldheeleen Ciise?
2. Maxay ahayd muhiimmadda ku jirtay Bilaatos oo rabay inuu sii daayo Ciise?
3. Muxuu la yaab u leeyahay hadalka Wadaadka Yuhuudda ee aayadda 15?
4. Waa maxay sababta faahfaahinta iskutallaab ku qodbista ay ugu kala duwan yihiin Injiilladu?
5. Waamaxay xidhiidhka Sharciga Kunoqoshadiisa 21:23 uu la leeyahay iskutallaab ku qodbistii Ciise?

YOOXANAA 20

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Sarakicistii Ciise	Godkii madhnaa	Sarakicistii	Godkii madhnaa	Godkii madhnaa
20:1-10	20:1-10	20:1-10	20:1-10	20:1-2 20:3-10
U muuqashadii Ciise u muuqday Maryantii Magdala	Maryantii Magdala oo aragtay Sayidka sara kacay		Ciise oo u muuqday Maryantii Magdala	U muuqashadii Maryantii Magdala
20:11-18	20:11-18	20:11-18	20:11-13a 20:13b 20:14-15a 20:15b 20:16a 20:16b 20:17 20:18	20:11-18
Ciise oo u muuqday xertii	Rasuulladii waa la diray		Ciise wuxuu u muuqday xertiisa	U muuqashadii xerta
20:19-23	20:19-23	20:19-23	20:19-23	20:19-23
Ciise iyo Toomas	Aragtida iyo rumaysashada		Ciise iyo Toomas	
20:24-29	20:24-29	20:24-29	20:24-25a 20:25b 20:26-27 20:28 20:29	20:24-29
Ujeedada kitaabka	Inaad rumaysataan		Ujeedada kitaabka	Gunaanadka ugu horreeya
20:30-31	20:30-31	20:30-31	20:30-31	20:30-31

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-29

- A. Dhammaanba ballan qaadyadii Ciise uu xerta ugu sameeyay cutubyada 14-17, waxa ay dhammays tirmeen galabnimadii Axaddii ee sarakicista. Eeg fiirada 16:20.
- B. Injiilladu waxa ay ku kala duwanyihiin faahfaahinta sarakicista sababtuna waa
 1. Waa markhaatiyaal goob joog ahaa
 2. Sanado badan ayaa kasoo wareegay
 3. Waxa qoray qoraayo la hadlayay koox gaar ah (Matayos 28; Markos 16; Luukos 24)

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 20:1-10

¹Maalintii ugu horraysay ee toddobaadka Maryan tii reer Magdala ayaa aroortii hore xabaashii timid, intay weli gudcur ahayd, oo waxay aragtay dhagaxii oo xabaashii laga qaaday. ²Sidaa daraaddeed orodday oo u tagtay Simoon Butros iyo kii kale oo xerta ahaa oo Ciise jeclaa, waxayna ku tidhi, Sayidkii ayay xabaashii kala baxeen, oo garan mayno meeshay dhigeen. ³Saas aawadeed Butros iyo kii kale oo xerta ahaa ayaa baxay, oo waxay tageen xabaashii. ⁴wada ordeen labadoodiiba, oo kii kale oo xerta ahaa ayaa Butros ka dheereeyey, oo uga hor maray xabaashii. ⁵Markaasuu foororsaday, oo wuxuu arkay maryihii oo yaal, laakiinse ma uu gelin. ⁶Haddana Simoon Butros oo daba socday baa yimid, markaasuu xabaashii galay, oo wuxuu arkay maryihii oo yaal ⁷iyo maradii madaxiisa saarnayd oo aan la oollin maryihii, laakiin meel keligeed ku duudduubnayd. ⁸Markaas haddaba waxaa galay kii kale oo xerta ahaa oo hore u yimid xabaashii, wuuna arkay oo rumaystay. ⁹Waayo, weli Qorniinka ma ay garan inay tahay inuu kuwa dhintay ka soo sara kaco. ¹⁰Haddaba xertii ayaa mar kale guryahoodii ku noqotay.

20:1 “Maalintii ugu horraysay ee toddobaadka” waa maalintii Axadda ee ku xigtay usbuucii Kormarista iyadoo Macbadkana la gayn jiray midhaha ugu horreeya. Ciise waxa uu ahaa midhihii ugu horreeyay ee kasoo sara kaca dhimashada (1 Korintos 15:23). Ciise oo saddex Axadood oo isku xigta muuqdayna waxa ay ka dhigantahay iyadoo cibaadada loogu kulmi doono maalmaha Axadda (aayadaha 19, 26; Luukos 24:36ff; Falimaha Rasuullada 20:7; 1 Korintos 16:2).

☐ **“Maryan tii reer Magdala”** waxay ka mid ahayd haweenkii raacay Ciise iyo Rasuullada, oo Ciise ayaana iyada jin kaga saaray Galiili dhexdeeda (Markos 16:9 iyo Luukos 8:2). Inkasta oo Injiilka Yooxanaa aanu sheegayn sababta maryan booqashadeedu ahayd, haddana Markos 16:1 iyo Luukos 23:56 ayaa ku tilmaamaya haween dhowr ahi (aayadda 2) inay yimaaddeen qabriga subax hore iyaga oo rabay jidhka Ciise inay udug mariyaan. Waxa laga yaabaa in aanay ogsoonayn Yuusuf iyo Nikodemos oo iyaga arrintaas uga horreeyay, kaddibna ay arkeen muhiimadda uduggu leeyahay maalintii xigtay.

☐ **“intay weli gudcur ahayd”** waxa laga yaabaa Maryan gurigeeda in ay kasoo baxday wakhti mugdi ah, laakiin markii ay soo gaadhay waxay ahayd waa ku dhowaagii (Matayos 28:1; Markos 16:2).

☐ **“waxay aragtay dhagaxii oo xabaashii laga qaaday”** macno ahaan “laga qaaday” waa isaga oo meeshiisii aan oollin (Matayos 28:2). Xasuusno dhagaxa in aan loo qaadin si Ciise uu qabriga ugasoo baxo, laakiinse waa si markhaatiyaashu qabriga usoo galaan! Jidhka Ciise ee sara kacay muu jirin wax celin karaa (20:19, 26).

20:2 “Sidaa daraaddeed orodday” shaki kuma jiro inay qabriga uga carartay iyadoo rabtay inay xerta u sheegto Ciise oon qabrigii ku jirin (Matayos 28:5).

▣ **“kii kale oo xerta ahaa oo Ciise jeclaa”** erayga jacayl Giriigga waa *phileō* waxaanay tusinaysaa “jacayl walaaltinnimo.” Luqada Giriigga ee Koine ka (300 C.H.-300 C.D.) waxa si iskumida loola adeegsaday *agapaō*. Kan xerta ahi markaa waxa uu u muuqdaa inuu yahay Yooxanaa oo ah qoraaga Injiilkan (aayadaha 4-8). Halkanna waxa uu kula socdaa Butros.

▣ **“Sayidkii ayay xabaashii kala baxeen”** falkan tegay waxa uu tusinayaa shaqo dhammaatay. Ciise meydkiisii meesha ma yaallo! Maryan siday u fikiraysay marka ay leedahay “xabaashii kala baxeen” waxay u jeeday hogaamiyayasha Yuhuudda. Waxa muuqata in Rasuulladu ay jooheen qolladdii kore waxaanay la yaabay sarakicista!

▣ **“garan mayno”** waxa ay tilmaamaysaa Maryantii Magdala, Maryantii Ciise hooyadiis ahayd, Saloome, Yo’anna iyo haweenkii kale (Matayos 28:1; Markos 16:1; Luukos 24:10).

20:4 “oo kii kale oo xerta ahaa ayaa Butros ka dheereeyey,” waxa hubaala in uu Yooxanaa ahaa Rasuullada kii ugu da’da yaraa.

20:5 “foororsaday” wakhtigaas kadinka xabaasha laga gala waxa uu ahaa mid gaaban ku dhowaad 3 ama 4 dhudhun. Waxa markaa lagama maarmaana qofku inuu foorarsado si uu u galo godka.

▣ **“arkay”** macno ahaan waa “eegis qoto dheer.” Sababtuna waxa ay ahayd iyadoo weli waagu aanu saani usoo iftiimin.

▣ **“maryihii oo yaal”** qoraalka Giriigga ahi tusin maayo meesha amaba sida loo dhigay kafanta, haddii maydka la xadi lahaana waxa caadi ahaan lala qaadi lahaa kafanta.

20:6 “Simoon Butros” Simoon (*Cephas*) wuxuu ahaa magaciisa Cibraaniga ah (Aramaati), halka Butros (*Petros*) uu ka ahaa magac Giriiga oo Ciise uu isaga u bixiyay. Macnaha magacani Giriigga ku samaynayaana waa “dhagaxii jarnaa” (Matayos 16:18). Xagga Aramaatigana ma jirto farqi u dhexeeya *Petros* iyo *Pertra*.

20:7 “maradii madaxiisa saarnayd” madaxa waxa ku dednaa maryo gaar ah (11:44), waxaana suurto gala in loo adeegsan jiray (1) in wejiga la dul saaro; (2) wejiga lagu duuduubo (NJB); ama (3) in kafanka lagu xidho (TEV).

▣ **“laakiin meel keligeed ku duudduubnayd”** waa fal sameeyaha dhammayska tiran een lagarnayn, waxaanay tusinaysaa in si gaara waxan loo sameeya. Tani si gaara ayay u soo jiidaday dareenka Yooxanaa iyo inuu rumaysto (aayadda 8).

20:8 “wuuna arkay oo rumaystay.” Yooxanaa waxa uu arkay caddaynta jidh ahaaneed waxaanu rumaystay in uu Ciise noolyahay! Laakiin miyuu (aayadaha 11 iyo 19)? Rumaystay sarakicistu inay noqotay arrin fiqiya oo muhiim ah.

1. Rooma 10:9-13

2. 1 Korintos 15

1 Korintos 15:12-19 ayaa si fiican u soo koobaya wixii dhici lahaa haddii aanu Ciise sarakicin! Sarakicistu waxay noqotay arrinta xaqiiqada u ahayd kaniisaddii hore iyo wacdintii rasuullada iyadoo Falimaha Rasuullada dhexdooda lagu magacaabo *Kerygma*. Eeg Mawduuca Gaarka ah 5:39.

20:9 “Qorniinka ma ay garan” waa faallada qoraaga, waxaanay tilmaamaysaa Sabuurka 16:10, kaasi oo Butros uu soo xigtay maalintii kontonaad ee Bentakostiga sida ku sugan Falimaha Rasuullada 2:27. Sidoo kalena waxa suurta gala inay tilmaamayso Ishacyaah 53:10-12 ama Hoosheeca 6:2. Xubnijii Senhadriinku waxay fahmeen sii sheegista sara kicista Ciise (Matayos 27:62-66), iyadoo weli aanay fahmin xertu!

Waxa laga yaabaa in aayaddani ay tusinayso macne fiqi ahaaneed oo ah inaanu Ruuxu weli xerta buuxinin, maxaa yeelay marka Ruuxa Quduuska ahi rumaystayaasha uuu ka buuxsamo, waxa ay fahmayaan erayada Ciise iyo shuqulladiisa (2:22; 14:26).

20:10 tani waxa ay sheegaysaa (1) inay dib ugu laabteen Galiili (Matayos 20:37; 28:7, 10, 16; Yooxanaa 21 wuxuu ku sheegayaa inay badda Galiili ka kalluumaysanayeen) ama (2) waxay u laabteen Yerusaaalem. Waxa haddaba aad loo xoojinayaa #2 maxaa yeelay qolladdii sare ayuu iyaga Sayidku ugu muuqday.

NASB (UPDATED) TEXT: 20:11-18

¹¹laakiin Maryan ayaa xabaashii dibaddeeda taagnayd iyadoo ooyaysa. Haddaba intay ooyaysay bay xabaashii ku foororsatay. ¹²Waxayna aragtay laba malaa'igood oo dhar cadcad xidhan oo fadhiya meesha meydka Ciise oolli jiray, mid madaxa, midna cagaha. ¹³Oo waxay ku yidhaahdeen, Haweenay yahay, maxaad u ooyaysaa? Markaasay ku tidhi, Waxaan u ooyayaa, Sayidkaygii bay qaadeen, oo garanna maayo meeshay dhigeen. ¹⁴Markay sidaa ku tidhi ayay dib u jeesatay oo ay aragtay Ciise oo taagan, mana ay garanaynin inuu Ciise yahay. ¹⁵Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Haweenay yahay, Maxaad u ooyaysaa? Kumaad doondoonaaysaa? Iyadoo u malaynaysa inuu yahay ninkii beerta ka shaqaynayay waxay ku tidhi, Adeerow, haddaad isagii halkan ka qaadday, ii sheeg meeshaad dhigtay, anna waan ka soo qaadan doonaa e. ¹⁶Ciise wuxuu ku yidhi, Maryamay. Markaasay jeesatay oo afka Cibraaniga ku tidhi Rabbooni, ee ah Macallimow. ¹⁷Ciise ayaa ku yidhi, Ha i taaban, waayo, weli kor uguma aan tegin Aabbaha, laakiin u tag walaalahay oo ku dheh. Wuxuu yidhi, Waxaan kor ugu tegayaa Aabbahay oo ah Aabbihiiin, Ilaahay oo ah Ilaahiiin. ¹⁸Maryan tii reer Magdala ayaa timid oo xertii ku tidhi, Waxaan arkay Sayidkii, oo waxay u sheegtay inuu waxyaalahaas iyada ku yidhi.

20:11 “iyadoo ooyaysa” waxa ay tusinaysaa baroor oo maaha oohinta caadiga ah oo keliya (11:31). Falka tegay ee soconaysaa waxa uu tusinayaa wax tegay oo sii socda. Barigana janaasadu waxa ay caan ku tahay caadifad iyo dareen muujin.

20:12 “laba malaa'igood” Yooxanaa iyo Luukos (24:23) waxay isku waafaqayaan joogitaanka labo malag. Matayos isna waxa uu sheegayaa malag keliya inkasta oo marar badan uu waxyaalo labo labo ah kaga hadlyo Injiilkiisa (8:28; 9:27; 20:30). Tani haddaba waxa ay tusaale u tahay waxyaalaha ay Injiilladu ku kala gedisan yihiin.

Qorayaasha Injiilladu iyaga oo waxyigu uu hagayo ayaa ay qoreen hadalladii iyo camalladii Ciise, iyaga oo wata ujeedooyikooda fiqi ahaaneed iyo cidda ay farriinta u gudbinayeen. Badanaa akhristayaasha casriga ahi waxay is waydiiyaan (1) midkee taariikh ahaan ugu saxsan Injiillada ama (2) waxay raadiyaan faahfaahinta taariikh ahaaneed ee dhacdo ama waxbaris qoraagu uu diiwaan geliyay. Mufasiriintu ugu horrayn waxa lagama maarmaan u ah, inay raadiyaan ujeedada qoraaga asalka ah, waayo si aan injiilka u fahano uma baahnin faahfaahin taariikh ahaaneed.

▣ “dhar cadcad” waxyaalaha ruuxiga ah waxa lagu sheegay iyaga oo xidhan dhar caddaan ah.

1. Ciise is bedelitaankiisii – Matayos 17:2; Markos 9:3; Luukos 9:29
2. Malagyadii joogay xabaasha – Falimaha Rasuullada 1:10
3. Malaa'igtii markii aadista samada – Falimaha Rasuullada 1:10
4. Qudiiisiiinta la jira Masiixa la ammaanay – Muujintii 3:4-5, 18
5. Malaa'igah ag jooga carshiga Ilaah – Muujintii 4:4
6. Shuhadada hoos joogta carshiga Ilaah – Muujintii 6:11
7. Dhammaan kuwa badbaaday – Muujintii 7:9, 13-14 (Daanyeel 12:10)
8. Malaa'igaha samada – Muujintii 19:14
9. Muuqaalka Axdiga Hore ee cafiska – Sabuurka 51:7; Ishacyaah 1:18 (calaamad u ah daahirsanaanta Ilaah, Daanyeel 7:9).

20:14 “mana ay garanaynin inuu Ciise yahay” Maryan may garanin Ciise, waxaana laga yaabaa sababtu inay ahayd

1. Indheheeda ilmaa ku taagnayd
2. Waxay ka eegaysay meel mugdi ah iyadoo iftiinka u jeedda
3. Muuqaalka Ciise oo sidiisii hore ka duwanaa

20:15 “adeerow/sayidow” eraygani Giriig wuxuu ku noqonayaa *kurios*. Halkana waxa loogu adeegsaday iyadoo xishmayn ah. waxa laga yaabaa Maryan inay u malaysay in ay la hadlayo (1) ninkii beerta falayay ama (2) ninkii beerta iska lahaa. laakiin u firso adeegsiga fiqi ahaaneed ee “Sayid” sida ka muuqata 20:28!

▣ **“haddii”** waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah, isla markaana dhinaca qofka hadlayay ka noqon karta run. Waxa ay u malaynasay in la xaday maydkii.

20:16 “Maryamay...Rabbooni” labada eray waa Aramaati (5:2; 19:13, 17, 20). Ciise waxa uu iyada ugu yeedhay magaceeda, waxaana laga yaabaa inuu sidaasoo kale sameeyay markuu la tukaday labadii xerta ahaa ee ku sii jeeday Emmaus (Luukos 24:30-31). Xarafka “I” ee ugu danbeeya “Rabbooni” waxa laga yaabaa in uu yahay “Sayidkaygiiyow” ama “macallinkaygiiyow.”

MAWDUUC GAAR AH: MUUQASHOYINKII CIISE EE SARAKICISTA DABADEED

Ciise si uu sarakicistiisa u tusiyo waxa uu u muuqday

1. Dumarkii qabriga agtiisa joogay, Matayos 28:9
2. Labo iyo tobankii xerta ahaa, Matayos 28:16
3. Simoon, Luukos 24:34
4. Labo nin, Luukos 24:15
5. Xertii, Luukos 24:36
6. Maryantii Magdala, Yooxanaa 20:15
7. Toban xerta ah, Yooxanaa 20:17
8. Kow iyo tobankii xerta ahaa, Yooxanaa 20:26
9. Todobadii xerta ahaa, Yooxanaa 21:1
10. Butros, 1 Korintos 15:5
11. Labo iyo Tobankii (Rasuulladii), 1 Korintos 15:5
12. 500 oo walaalaha ah, 1 Korintos 15:6 (Matayos 28:16-17)
13. Yacquub (qoyskiisii hore), 1 Korintos 15:7
14. Dhaammaan Rasuulladii, 1 Korintos 15:7
15. Bawlos, 1 Korintos 15:8 (Falimaha Rasuullada 9)

Waxa muuqata in aayadahan kuwo ka mid ahi ay sheegayaan muuqasho isku mid ah, Ciisena waxa uu doonay in ay gaartaan inuu nool yahay!

20:17

NASB “Ha i taaban”

NKJV “Ha itaabanin”

NRSV “Ha I qabsanin”

TEV “Ha I qabsan aniga”

NJB “Ha itaabanin”

KJV waxa uu qorayaa “ha itaabanin.” Ficilkan amarka ahi waxa uu tilmaamayaa joojinta fal soconaya, Maryan ayaana qabsatay Ciise! Tani caddayn uma aha isaga oo u diiday wax la xidhiidha Ilaahnimadiisa, maxaa yeelay Yooxanaa 20:26 waxa uu Toomas ugu oggolaaday inuu isaga taabto. Sidoo kale Matayos 28:9 waxa uu haweenka u oggolaaday in ay lugihiisa qabsadaan.

▣ **“weli kor uguma aan tegin”** waa fal dhammays tiran oo ku dhisan garasho tusmayna wada. Ciise samada muu tegi doonin ilaa 40 cisho kaddib sarakicistiisa (Falimaha Rasuullada 1:9).

▣ **“u tag walaalahay”** Sayidka la sara kiciyay, ee ammaanmay waxa uu fulayadan ugu yeedhaa “walaalo” (Matayos 12:50).

▣ **“kor ugu tegayaa”** waa fal jooga. Taasi ma aanay suurtoobin ilaa 40 cisho dabadeed isaga oo la joogay xerta (Luukos 24:50-52; Falimaha Rasuullada 1:2-3). Yooxanaa waxa uu si joogto ah u adeegsanayaa labonimada “kor” iyo “hoos.” Ciise waxa uu ka yimid Aabbaha agtiisa (hore u jiray) sidoo kale waxa uu u laabanayaa Aabbaha (ammaanitaanka).

▣ **“Aabbahay oo ah Aabbihiiin”** waa hadal cajiib leh! tan loogalama jeedo iyadoo carruurnimada rumaystayaashu aanay la mid ahayn tan Ciise. Isagu waa Wiilka gaarka ah ee Aabbaha (3:16) waana Ilaah buuxa

iyo aadane buuxa. Rumaystayaashuna isaga ayaa ay ku noqonayaan kuwo ka mida qoyska. Isagu waa Rabbi, Badbaadiye, iyo walaal!

20:18 Maryan sidoo kale waa markhaati!

NASB (UPDATED) TEXT: 20:19-23

¹⁹Haddaba maalintaas markay makhribkii ahayd, ayaantii u horraysay ee toddobaadka, oo ay albaabbadu xidhnaayeen meeshay xertu joogtay cabsida ay Yuhuudda ka cabsadeen aawadeed, ayaa Ciise yimid oo isdhex taagay, oo wuxuu ku yidhi, Nabadi ha idinla jirto. ²⁰Oo markuu waxaas yidhi, wuxuu iyagii tusay gacmihiisii iyo dhinaciisii. Sidaa daraaddeed xertii waa ku farxeen markay Sayidkii arkeen. ²¹Haddaba Ciise ayaa mar kale ku yidhi, Nabadi ha idinla jirto. Sida Aabbuhu ii soo diray ayaan anna idiin dirayaa. ²²Oo markuu waxaas yidhi ayuu ku neefsaday oo ku yidhi, Aqbala Ruuxa Qoduuskaa. ²³Nin alla ninkaad dembiyadiisa cafidaan cafiyan yihiin, nin alla ninkaad dembiyadiisa ku celisaan ceshan yihiin.

20:19 “alintaas markay makhribkii ahayd” wakhtiga Yuhuudda ayaa bilaabmi jiray dhammaana jiray fiidka (Bilowgii 1:5), halkanna waxay ahayd ilaa 6:00pm ee makhribnimadii Axaddii.

▣ “ayaantii u horraysay ee toddobaadka” maalinta Axaddu waxa ay ahayd ayaamaha usbuuca maalintaa ugu horraysa, sida inaga ay maanta Isniintu inoogu tahay. Si xusitaanka sarakicista Ciise ay u waarto ayaa maalintaa Axaddu waxa ay noqotay maalintaa cibaadada ee kaniisadda, waxaana tan aasaaska ku dhigay Ciise oo qolladdii sare saddex axadood oo isku xigay kusoo muuqday (aayadaha 19, 26; Luukos 24:36ff; Falimaha Rasuullada 20:7; 1 Korintos 16:2).

Jiil Masiixiyiintu ugu horraysay waxa ay isu iman jireen maalmaha Sabtida iyadoo sidoo kalena maalmaha ciidaha la isugu iman jiray Macbadka. Si kastaba ha ahaatee rabbiyiinta ayaa sheegay in “dhaarta habaarku” saarantahay midkasta oon diidin in uu Ciise yahay Masiixa. Haddaba, Masiixiyiintii hore waa ay iska daayeen inay kulmaan maalmaha Sabtida waxaanay go’aansadeen inay kulmaan maalmaha Axadda iyaga oo xusaya sarakiciddii Ciise.

▣ “oo ay albaabbadu xidhnaayeen” waa magaca fal sameeyaha aan la garanayn. Jamacu waxa uu tilmaamayaa in albaabada labada dabaqba ay ahaayeen kuwo xidhan, sababta tan loo sheegayna waa iyadoo la muujinayo (1) awoodda Ciise iyo (2) iyadoo la muujinayo cabsidii ay qabeen.

▣ “xertu” Toomas muu joogin, laakiinse Rasuulladii kaloo dhan ayaa joogay (Luukos 24:33).

▣ “Nabadi ha idinla jirto.” Erayadani waxa ay muujinayaan layaabkooda ama laga yaabee cabsidoodii. Ciise iyaga waxa uu u ballan qaaday nabad (14:27; 16:33). Waxa ay tanina ka tarjumaysaa salaanta Cibraaniga ee *shalom*. Ciise waxa uu ku celiyay saddex jeer (19, 21, 26).

20:20 “wuxuu iyagii tusay gacmihiisii iyo dhinaciisii” waxa muuqata iyada oo Yooxanaa uu dhinacii laga wareemay u sheegayo si ka badan marka loo eego Injiillada kale (19:37; 20:25). Lugihiisa lama sheegin marka laga reebo Luukos 24:29 iyo Sabuurka 22:16. Jidhka Ciise ee ammaanmayna waxa uu lasoo noqday calaamadihii iskutallaab ku qodbitaanka (1 Korintos 1:23; Galatiya 3:1).

▣ “Sayidka” magacan waxa loo adeegsadaa dhinaca fiqiga isagoo tusinaya YHWH Axdiga Hore (Baxniintii 3:14). Ku magacaabidda magacan Aabbaha ee Axdiga Hore oo lagu magacaabay Ciisena, waxa ay tusinaysaa Ilaahnimadiisa. Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:19.

20:21 “Sida Aabbuhu ii soo diray” waa fal ebyan oo ku dhisan garasho tusmayna sida (17:18). Kaniisaddu waxa ay leedahay amar Ilaahi ah (Matayos 28:18-20; Luukos 24:47; Falimaha Rasuullada 1:8) rumaystayaashana farriin ayaa u ahaatay (2 Korintos 5:14-15; 1 Yooxanaa 3:16). Ciise labo eray oo kala duwan ayuu u adeegsaday erayga “diris,” waxayna samaynayaan macno isku mida Yooxanaa dhexdiisa. Tani waxa ay ka muuqanaysaa cutubka 8,

halkaasoo *pempo* loogu adeegsaday Ciise oo Aabbuhu soo diray (8:16, 18, 26, 29) iyadoo sidoo kalena *apostellō* uu ku adeegsaday 8:42. Sidoo kale waxa la mid ah cutubyada 5, 6. Eeg Mawduuca Gaarka (*Apostellō*) ah 5:24.

20:22 “ku neefsaday” erayga “neef” ee Cibraaniga *ruach* iyo Giigga *pneuma* waxa macnohoodu noqon karaa “dabayl, ” ama “ruux.” Falka isku midka ahna waxa Sebtuujantiga loogu adeegsaday tilmaamista shaqadii abuurka ee Bilowgii 2:7 iyo dib u soo noolaynta Israa’iil sida ku sugan Yexesqeel 37:5, 9. Magac u yaalka “iyaga” waxa uu tilmaamayaa koox ka badan Rasuullada (Luukos 24:33).

▣ **“Aqbala Ruuxa Qoduuskaa.”** Waa fal tegay oo ku dhisan garasho. Waxa aan la hubin arrintani xidhiidhka ay la leedahay maalintii kontonaad. Ciise waxa uu fuliyay dhammaanba wixii uu xertiisa u ballan qaaday laga bilaabo markii u horraysay ee uu soo muuqday. Arrinatani waxa ay la xidhiidhay u diyaar garaynta adeeggooda cusub sida Ruuxuba Ciise adeeggiisa uu ugu diyaariyay markii la baabtiisayay.

Aayaddan waxa loo adeegsaday kaniisaddii hore iyadoo la falaqaynayho haddii Ruuxu uu ka yimid Aabbaha ama Wiilka. Sida hubaasha ahna waxa la yidhaahdaa Saddexmidnimadu waxa ay ka wada qayb qaadatay hawsho badbaadada.

Kitaabkiisa *A Theology of the New Testament* ayaa George Ladd waxa uu kusoo koobayaa fasiraadaha suurta galka ah.

“Qoraalkani waxa uu keenayaa adayg ku waajahan imaatinka Ruuxa ee maalintii kontonaad ee Bentakostiga, waxaana suurta gala mushkiladda in lagu xallin karo saddex siyaalood. Waxa laga yaabaa in Yooxanaa aanu garanin maalintii Bentakostiga, isagoo markaasna beddelkeeda keenay Bentakostiga Yooxanaa, ama waxa jiray labo jeer oo Ruuxa Quduuska ah la bixiyay, ama afuufitaanka Ciise waxa uu tusaalayn u ahaa waxa iman doona maalintaa kontonaad ee Bentakostiga” (p. 289).

Fiiirada #24 (p.1965) ee NET Bible ayaa sheegaya in tani xasuusinayso Bilowgii 2:7 (LXX). Sida nolosha jidh ahaaneed loogu bixiyay Bilowgii ayaa nolosha weligeed ahna loogu bixiyay Axdiga Cusub. Tani waxa ay xoojinaysaa “neefta Ilaah” ee la midka ah Yexesqeel 37, halkaasoo YHWH oo uu dadkiisa ugu keenayo nolol cusub isagoo adeegsanaya neefta Ruuxa.

20:23 “Nin alla ninkaad dembiyadiisa cafidaan” waa labo jumlad shuruudood oo heerka saddexaad ah iyadoo ay la socoto *an* oo hadiyo goor loo adeegsado iyadoo la socoto jumlad shuruudeedyada heerka labaad ah, halkii laga adeegsan lahaa *ean*. Isku dhexjiritaankan jumlad shuruudeedyadu waxa uu adkaynayaa xidhiidhka u dhexeeya kuwa Injiilka gaadhsiinaya iyo kuwa rumaysadka ku aqbalaya. Qof Injiilka aqoon u leh ayaa dooranaya inuu la wadaago kuwo kale oo kaasina in uu doorto ayuu aqbalayaa. Haddaba labadanba waa la rabaa. Aayaddani wax awooda siin mayso wadaaddada, laakiinse waxa ay awood siinaysa kuwo rumaysta! Awooddani waxa ay soo baxday wakhtigii Ciise noloshiisa.

▣ **“cafiyan yihiin”** waa fal ebyan oo ku dhisan wax aan la garanayn tasmayna sida. Waxa uu tusinayaa cafiska Ilaah ee dhammayska tiran kuna waajahan denbiga ee ku sugan Injiilka. Rumaystayaasha waxay haystaan furayaasha boqortooyada (Matayos 16:19), waana haddii ay adeegsadeen. Ballan qaadkani waxa uu u ahaaday kaniisadda ee maaha shakhsiyaad. Mawduucani waxa uu fiqi ahaan u egyahay Matayos 18:18.

NASB (UPDATED) TEXT: 20:24-25

²⁴laakiin Toomas mid laba iyo tobanka ka mid ah oo Didumos la odhan jiray lama joogin markuu Ciise yimid. ²⁵Haddaba xertii kale ayaa ku tidhi, Waxaannu aragnay Sayidkii. Laakiin wuxuu ku yidhi, Haddaanan gacmihiisa ku arkin calaamadii musmaarrada, oo aanan fartayda gelin nabarkii musmaarrada, oo aanan gacantayda gelin dhinaciisa, rumaysanba maayo.

20:24 “laakiin Toomas mid laba iyo tobanka ka mid ah oo Didumos la odhan jiray lama joogin markuu Ciise yimid.” Didumos macnihiisa Giriiggu waa “mataa” (11:16). Hadiyo goor dadku qoraalkan ayay adeegsadaan iyaga oo Toomas ku sheegaya shakiyihii, laakiin waa in aan xasuusano waxa kusoo arooray 11:16. Toomas si ka badan Injiillada kale ayuu uga dhex muuqanayaa Injiilka Yooxanaa (11:16; 14:5; 20:24, 26, 27, 28, 29; 21:21).

20:25 “Haddaanan...rumaysanba maayo” “Haddaanan” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah waxaana la socota diidmo xooggan, “weligay ma rumaysan doono” taabasho ama aragti la’aan. Ciise haddaba waxa uu sharfayaa dalabka Toomas, maxaa yeelay Ciise marar badan ayuu la tacaalay rumaysadka xerta isaga oo adeegsanaya (1) mucjisooyinkiisa iyo (2) waxsii sheegyadiisa. Farriinta Ciise iyaga way ku cusbayd waxaanay u baahnaayeen inay helaana wakhti ay ku fahmaan.

MAWDUUC GAAR AH: CALAAMAD

Dhibaataadu waxay tahay erayga *tupos*, oo loo adeegsado macnayaal dhor ah:

1. Moulton and Milligan, *The Vocabulary of the Greek New Testament*, p. 645
 - a. Tusaale
 - b. Qorshe
 - c. Qaab ama nidaam qoraaleed
 - d. Go’aan
 - e. Weedh
 - f. Qaabka jidhka aadanaha oo la hordhigaya ilaaha bogsiinta
2. Louw and Nida, *Greek-English Lexicon*, vol. 2, p. 249
 - a. Xagtin (Yooxanaa 20:25)
 - b. Sanam (Falimaha Rasuullada 7:43)
 - c. Tusaale (Cibraaniyada 8:5)
 - d. Tusaale/ ekaansho (1 Korintos 10:6; Filiboy 3:17)
 - e. Sawir la xidhiidha qaabka (Rooma 5:14)
 - f. Nooc (Falimaha Rasuullada 23:25)
3. Harold K. Moulton, *The Analytical Greek Lexicon Revised*, p. 411
 - a. Calaamad (Yooxanaa 20:25)
 - b. Sawir gacmeed
 - c. Sanam (Falimaha Rasuullada 7:43)
 - d. Sawir (Rooma 6:17)
 - e. Jaantus (Falimaha Rasuullada 23:25)
 - f. Tusaale (1 Korintos 10:6)
 - g. Nooc (Rooma 5:14; Cibraaniyada 8:5)
 - h. Tusaale maaddi ah (Falimaha Rasuullada 7:44; Cibraaniyada 8:5)
 - i. Tusaale akhlaaqeed (Filiboy 3:17; 1 Tesaloniika 3:9; 1 Timoteyos 4:12; 1 Butros 5:3)

Marka la eego macnaha waxa ay u muuqataa # inuu vahav ka ugu habboona. Injilku waxa uu

☐ **“calaamaddii”** eeg Mawduucan Gaarka ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 20:26-29

²⁶Oo siddeed maalmood dabadeed xertiisii gudaha ayay mar labaad wada joogeen, oo Toomasna waa la joogay. Markaasaa Ciise yimid, albaabbadii oo xidhan, oo intuu isdhex taagay ayuu ku yidhi, Nabadi ha idinla jirto. ²⁷Markaasuu Toomas ku yidhi, Fartaada keen oo arag gacmahayga, oo gacantaadana keen oo geli dhinacayga, oo ha rumaysad la'aanin laakiin rumayso. ²⁸Toomas ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Rabbigay iyo Ilaahayow. ²⁹Markaasaa Ciise ku yidhi, Waad i aragtay, taas aawadeed ayaad rumaysatay. Waxaa barakadaysan kuwa aan i arag ee rumaystay.

20:26 “siddeed maalmood dabadeed” waa erayo Cibraaniya oo tusinaya usbuuca. Waxay ahayd galabnimo Axada oo kale, isaga oo Ciise xertiisa ugu muuqday qolladdii sare (laga yaabaa Yooxanaa Markos) saddex habeen oo isku xigta waana sababta maalintaa Axadda looga dhigay maalin cibaado.

20:27 “oo ha rumaysad la'aanin laakiin rumayso” falka amarka ahi waxa uu tilmaamayaa joojinta camal hore u socday. Rumaystayaasha oo dhammina waxa ay isugu jiraan kala cayn shaki iyo rumaysad ah!

20:28 waxa suurto gal ah qirashada Toomas fiqi ahaan inay la xidhiidho aayadda 17. Waxayna la xidhiidhi kartaa Axdiga Hore YHWH *Elohim* (Bilowgii 2:4) iyadoo magacana lagu tarjumay “Rabbiyow Ilaah.” Ciise waxa uu si buuxda u aqbalayaa iyada oo loogu yeedhay Ilaahnimo. Laga bilaabo cutubka 1, aayadda 1, Injiilka Yooxanaa waxa uu ka hadlayaa Ilaahnimada Ciisihii reer Naasereet.

Ciise Ilaahnimada marar badan ayuu sheegtay sida ku suga Yooxanaa (8:58; 10:30; 14:9; 20:28) qoraaguna waxa uu sheegayaa Ilaahnimadiisa sida ku sugan 1:1, 14-18; 5:18. Sidoo kalena qorayaasha kale ee Kitaabka ayaa iyaguna qiraya Ciise Ilaahnimadiisa (Falimaha Rasuullada 20:28; Rooma 9:5; Filiboy 2:6-7; Kolosay 1:15-17; 2 Tesaloniika 1:12; Tiitos 2:13; Cibraaniyada 1:8; 2 Butros 1:1, 11; 1 Yooxanaa 5:20).

20:29 erayada furitaanka ahi waxa ay noqon karaan hadal ama su’aal filaysa jawaaba oggolaansho ah, qaabkeeda

NASB (UPDATED) TEXT: AAYADAHA 20:30-31

³⁰Haddaba waxaa Ciise ku sameeyey xertii hortooda calaamooyin kale oo badan oo aan ku qornayn kitaabkan. ³¹laakiin waxyaalahan waxaa loo qoray inaad rumaysataan inuu Ciise yahay Masiixa, Wiilka Ilaah, iyo inaad nolosha ku lahaataan magiciisa idinkoo rumaysanaya.

naxwe ahaaneedna uu qarsoon yahay. Waxa ay la mid tahay barakada ku sugan 17:20 (1 Butros 1:8).

20:30 shaki kuma jiro in aayadaha 30 iyo 31 ay yihiin ujeedada Injiilka Yooxanaa. Waxa weeyi faafin wacdin ah! qorayaasha Injiilku waxa ay haysteen xorriyad iyo qaabayn ay ku samaynayeen hadalladii Ciise iyo camalladiisii iyada oo Ruuxa Quduuska ahi uu hagayay, ujeedadooduna waxay ahayd in ay fariinta gaadhsiiyaan cidd ay la hadlayeen, ha ahaadaan, Yuhuud, Roomaan, iyo kuwo kale intaba, waxaanay tusinayeen runta ku jirta Ciise. Axdiga Cusubina maaha Talmuud Masiixiyadeed.

Maqaalka cinwaankiisu yahay “The Authority and Inspiration of the Bible” oo furitaanka u ah Carl F. H. Henry kitaabkiisa The Expositor’s Bible Commentary, Vol. 1 ayaa leh:

“Kitaabka Quduuska ah ujeedadiisu maaha inuu soo weriyo dhacdooyin taariikheed, ha ahaato mid la xidhiidha abuurka ama taariikhda badbaada oo ay ka mid tahay taariikhda jidh soo qaadashadu. Ujeedada Kitaabku waa keenista waxa lagama maarmaanka u ah badbaadada aadanaha iyo addeecitaanka ka iyaga abuuray. Inkasta oo qorayaasha Kitaabku ay shuqulka Ilaah ee badbaadada dhinacyo iyo ujeedooyin kala duwan ugaga eegayaan, haddana waxa ay inooga waramayaani waa run. Matayos ayaa taariikhda u adeegsanaya adeeggii Ciise ilaa uu kasoo gaadhayo ujeedadiisa uu uga socdo, halka Luukos uu ka tegayo waxyaalo badan oo kusoo arooray Markos, isagoo ujeedadiisu tahay inuu dejiyo habayn gaara oo ku habboona waxbarista diinta (1:4). Yooxanaa isaguna waxa uu adkaynayaa xaqiiqada ku jirta afarta Injiil (20:30, 31)” (pp. 27-28).

☐ **“waxaa Ciise ku sameeyey xertii hortooda calaamooyin kale oo badan”** calaamadahan waxa loo fahmi karaa siyaabo dhowr ah:

1. Calaamooyinka inuu run u noolaa
 - a. Iyagoo taabtay nabarradiisii
 - b. Isagoo wax la cunay iyaga
2. Calaamooyin gaara oo la diiwaan gelin oo uu ku sameeyay iyaga hortooda
3. Iyadoo u noqonaysa adeeggii noloshiisa (waxyaalihii hore) isagoo u diyaarinayay inay diiwaan geliyaan Injiillada (Luukos 24:46-48).

20:31

NASB, NKJV, TEV, NJB “inaad rumaysataan”

NRSV “inaad noqotaan kuwo rumaysta”

Kuwo ka mida qoraal gacmeedyadii hore ee Giriigga, P⁶⁶, κ^* , B iyo qoraalka Giriigga ee uu adeegsaday Origen, ayaa dhigaya fal jooga, taasi oo tusinaysa in Yooxanaa uu u qoray, inuu rumaystayaasha ku dhiirri geliyo kusii socodka rumaysadka.

Qoraallada kale (κ^2 , A, C, D, L, N, W) ayaa dhigaya fal tegay, taasi oo tusinaysa in Yooxanaa uu u qoray kuwa aan rumaysadka lahayn. UBS⁴ ayaa falka tegay ku dhigaya “C” (go’aan qaadasho adag). Aayaddani waxa ay tusinaysaa ujeedada Injiilka, waana wacdinta Yooxanaa.

▣ **“Masiixa”** waa tarjumaadda erayga Cibraaniga ah ee “Messeiah” oo macnihiisu yahay “kii la subkay.” Fahanka Masiixa ee Axdiga Hore lagu adeegsaday waxa uu ahaa adkaynta yeedhitaanka Ilaah iyo u diyaar garoobitaanka da’da xaqnimada. Ciisihii reer Naasereet (1:45) waa Masiixa Yuhuudda (11:27).

Magacani waxa uu kusoo aroorayaa bilowga Injiilka Yooxanaa (1:41), laakiin magaca “Rabbi” oon ahayn “Masiixu,” waxa uu ahaa magac caadi ah oo Ciise loogu adeegsaday macnayaasha dadka aan Yuhuudda ahayn (Rooma 10:9-13; Filiboy 2:9-11).

Fahanka la xidhiidha “Masiix” waxa uu leeyahay qaabab kale (1) Farrisiinta waxa uu u xanbaarsanaa filashooyin xagga siyaasadda iyo bulshada ah, iyo (2) xagga suugaanta Abokalaytiga ee Yuhuuddana waxa uu u xanbaarsanaa rajooyin caalamka iyo dunida la xidhiidha.

▣ **“Wiilka Ilaah”** magacn inyar mooyee badanaa laguma adeegsan Injiillada kale (laga yaabaa in kuwa aan Yuhuudda ahayni si kale u fahmi kareen), laakiin Yooxanaa ugo horrayntaba waa lagu adeegsaday (1:14, 34, 49). Waa qaabka u gaarka ah Yooxanaa isaga oo adkaynta xidhiidhka u dhexeeya Ciise iyo Aabbaha. Yooxanaa tusaalayaasha qoysnimada waxa uu u adeegsanayaa siyaabo dhowra

1. Magac

2. Xidhiidh la leh “madiga” (*monogenēs*, 1:18; 3:16; 1 Yooxanaa 4:9)

3. Isagoo la socda adeegsiga magaca “Aabbe” (20:17)

Eeg Mawduuca Gaarka ah: Wiilka Ilaah 1 Yooxanaa 3:8.

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Yaa yid qabriga? Goormay ahayd? Sababtuna maxay ahayd?

2. Maxay xertu u fili waayeen sarakicista? Cidina ma sarakicista?

3. Maxay Maryan u garan wayday Ciise?

4. Muxuu Ciise Maryan ugu sheegay inaanay taabanin?

5. Sharrax aayadaha 22-23 adigoo adeegsanaya ereyadaada kuu gaarka ah.

6. Miyay wanaagsantahay inaan Toomas ugu yeedhno “mushakigii”?

7. Qeex erayga “rumays” sida aad uga fahantay wakhtigii Ciise, oon ahayn wakhtigeennan aan joogno?

YOOXANAA 21

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ciise oo u muuqday toddoba Xerta ahaa	Ka Quraacashadii Badda	Mucjisadii kalluunka badan	Ciise wuxuu u muuqday toddobo xerta ah	Muuqashadii xeebta agteeda
21:1-14	21:1-14	21:1-3 21:4-8	21:1-3a 21:3b-5a 21:5b 21:6 21:7-10	21:1-3 21:4-8
Ciise iyo Butros	Ciise oo dhiirri geliyay Butros	21:9-14	21:11-14 Ciise iyo Butros	21:9-14
21:15-19	21:15-19	21:15-19	2:15a 21:5b 21:15c-16a 21:16b 21:16c-17a 21:17b 21:17c-19	21:15-19
Ciise iyo xerowgii la jeclaa	Xerowgii la jeclaa iyo kitaabkiisa		Ciise iyo kii kale ee xerta ahaa	
21:20-23	21:20-25	21:20-23	21:2-21 21:22 21:23 21:24	21:20-23 Gebogebada labaad
21:24		21:24-25	Gebogebada	21:24
21:25			21:25	21:25

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

İYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad

2. Baaragaraafka labaad

3. Baaragaraafka saddexaad

4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-25

A. Waxa jirta dood ku saabsan haddii cutubka 21 uu dheeraad ku yahay Injiilka Yooxanaa, maxaa yeelay waxay u muuqataa inuu ku dhammaanayo 20:31. Si kastaba ha ahaatee, ma jirto qoraal gacmeedyada Giriigga mid qudha oo ka tegaya cutubka 21.

B. Badanaa waxa la rumaysan yahay aayadda 25 inay dheeraad ku tahay macnaha, maxaa yeelay qoraal gacmeedyada qaarkood Yooxanaa 7:53-8:11 waxa la geliyay aayadda 24 dabadeed. Sidoo kale qoraal gacmeedyada hore ee Sinatakis ka aayadda bedelay waxa uu jaray aayadda 25, laakiin dib ayuu usoo celiyay.

C. Inkasta oo cutubka 21 aanu ahayn qayb asaasi ka ah Yooxanaa, hadana waxa uu ka ahaaday gacantii Rasuul Yooxanaa, waxaanu kaniisaddii hore uga jawaabayaa labo su'aalood:

1. Ciise ma usoo celiyay Butros muhiimaddiisii?

2. Maxay tahay sheekada la xidhiidha Yooxanaa oon dhimanin?

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 21:1-3

¹Waxyaalahaas dabadeed Ciise ayaa mar kale xertii isugu muujiyey Bad Tiberiyas agteeda. Oo sidatan ayuu isu tusay. ²Waxaa wada joogay Simoon Butros, iyo Toomas ka la yidhaahda Didumos, iyo Nataana'el oo ahaa kii Kaana tii Galili, iyo wiilashii Sebedi, iyo laba kale oo xertiisa ah. ³Simoon Butros wuxuu iyaga ku yidhi, Waa soo kalluumaysanayaa. Markaasay ku yidhaahdeen, Annana waa ku raacaynaa. Markaasay tageen oo doonnida fuuleen; laakiin habeenkaas waxba ma ay qaban.

21:1 “Bad Tiberiyas” Tiberiyas waxa ay ahayd caasimad maamuleedkii Roomaanka ee Galiili. Sidoo kale waxa loo yaqaanaa “Badda Galiili” (6:1) ama “Haro Gennesaret” (Matayos 14:34; Markos 6:35; Luukos 5:1) Axdiga Hore dhexdiisana waxa lagu magacaabaa “Haro Chinnereth” (Tirintii 34:11; Sharciga Kunoqoshadiisa 3:17; Yashuuca 11:2; 12:3; 13:27; 19:35; 1 Boqorradii 15:20).

☐ **“Oo sidatan ayuu isu tusay”** falku waxa uu la xidhiidhaa isu muujinta dhammayska tiran ama caddaanka ah (1:31; 2:11; 7:4; 9:3; 1 Yooxanaa 1:2; 2:28; 3:2; 4:9). Meesha sida uu sheegayo Matayos waa buur dusheed (16:32; 28:7, 10, 16), halkaasoo Ciise uu ku siiyay “amarka wayn”, laakiin Yooxanaa sida uu sheegayo waa Bad Tiberiyas. Ciise waxa uu usoo muuqday isagoo ka jawaabayaa labada su'aalood ee

1. Ciise miyuu Butros usoo celiyay muhiimaddii hogaamiyanimada?

2. Maxay tahay sheekada la xidhiidha Yooxanaa oon dhiman?

21:2 “Toomas ka la yidhaahda Didumos” eeg Mawduuca Gaarka ah ee ku saabsan magacyada Rasuullada 1:45. Toddobo ka mid ahaa xerta ayaa kalluumaysi u baxay.

☐ **“iyo wiilashii Sebedi”** waxa hadalku tusinayaa Yacquub iyo Yooxanaa (Matayos 4:21). Injiilka Yooxanaa Yacquub iyo Yooxanaa magac dhawi maayo.

21:3 “Simoon Butros wuxuu iyaga ku yidhi, Waa soo kalluumaysanayaa” falku waa fal jooga. Waxa jira haddaba aragtiyo la xidhiidha kalluumaysigaas:

1. Waxay ahayd usbuuc nasho ah oo wakhti is dhaafin ah ilaa inta uu markale Ciise la kulmayo iyaga (Matayos 26:32; 28:7, 10).
2. Waxay u bexeen inay soo shaqaystaan
3. Waxay ahayd socdaal Butros loogu soo celinayo shaqada ugaadhsiga. Cutubkani waxa uu aad ugu eegyahay Luukos 5.

☐ **“habeenkaas waxba ma ay qaban”** u fiirso nimankaas awooday inay bogsiyaan kuwa xanuunsanaya iyo saaritaanka ruuxaha sharka leh, may awoodi karin markasta inay mucjisoooyin sameeyaan. Falkan Axdiga Cusub dhexdiisa laguma sifeeyo kalluumaysi, laakiin waxa lagu sifeeyo soo qabasho.

NASB (UPDATED) TEXT: 21:4-8

⁴laakiin markii waagu beryay Ciise wuxuu taagnaa xeebta, xertiisiise ma ay garanaynin inuu Ciise yahay. ⁵Markaasaa Ciise haddaba ku yidhi, Carruur yahay, wax la cuno ma haysaan? Waxay ugu jawaabeen, Maya. ⁶Markaasuu ku yidhi, Shabagga ku tuura dhinaca midigta ee doonnida, waadna heli doontaane. Haddaba tuureen, oo ma ayna karin inay soo jiidaan, kalluunka faro badnaantiisa aawadeed. ⁷Kii xerta ahaa oo Ciise jeclaa ayaa ku yidhi Butros, Waa Sayidkii. Haddaba markuu Simoon Butros maqlay inuu Sayidka yahay, ayuu dharkiisa guntaday (waayo, wuu qaawanaa), oo wuxuu isku tuuray badda. ⁸laakiin xertii kale waxay ku yimaadeen sixiimadda yar (waayo, kama ay fogayn dhulka, laakiin waxay u jireen qiyaastii laba boqol oo dhudhun), waxayna jiidayeen shabaggii kalluunka.

21:4 “xertiisiise ma ay garanaynin inuu Ciise yahay.” Waxa jirta aragtiyo dhowra oo ku saabsan sababta ay xertu u garan waayeen Ciise:

1. Laga yaabaa inay mugdi ahayd
2. Inuu ka fogaa
3. Inay aad u daallanaayeen
 4. Ciise oo si kale u ekaa (Yooxanaa 21:12; Matayos 28:16-17; Luukos 24:13ff)
 5. Awood Ilaahi ah ayaa u diidday inay gaartaan (Luukos 24:16)

21:5 “Carruur yahay” waa tusaalayn. Axdiga Cusubi waxa uu adeegsanayaa labo eray oo ah “carruur yaryar.” Kan oo ah (*paidion*) waxa la adeegsaday isaga oo ka duwan (*teknion*) ka lagu adeegsaday Yooxanaa iyo 1 Yooxanaa. Eraygani Injiilka dhexdiisa waxa uu kagasoo aroorayaa keliya 4:49; 16:21, iyo halkan. Erayadan isku si ayaa loogu adeegsaday Yooxanaa, *paidion* 2:13, 18, iyo *Teknion* sida ku sugan 2:1, 12, 28.

☐ **“wax la cuno ma haysaan?”** erayga “kalluun” (*prospagion*) waxa uu ka tarjumayaa cunto kasta oo rooti lagu cuni karo, laakiin macnuhu sida uu toosinayo kalluun ayaa la dalbaday. Su’aashani waxay filaysaa markaa jawaaba diidmo ah.

21:6 Ciise waxa uu u dhaqmay isla sidii markii uu xerta u yeedhayay ee ugu horraysay, Luukos 5:1-11. Sida cutubkan u gaarka ah (eeg fiirada aayadda 15) Yooxanaa waxa uu dooni u adeegsanayaa labo magac oo kala duwan, *plouion* sida ku sugan aayadda 3 io 6 iyo *plouaron* (laash) sida ku sugan aayadda 8. Waxaanu ku muujinayaa cutubka qaab suugaaneedkiisa kala duwan.

21:7 “Kii xerta ahaa oo Ciise jeclaa” Waxa ay tilmaamaysaa qoraaga Injiilka oo ah Yooxanaa (13:23; 20:2, 3, 8; 21:20). Yooxanaana iskuma dhex magacaabay Injiilkiisa.



NASB “dharkiisa guntaday (waayo, wuu qaawanaa),”
NKJV “dharkiisa guntaday (waayo wuu iska dhigay)”
NRSV “dharkii xidhay, waayo wuu qaawanaa”
TEV “dharkiisii isku duudduubay (waayo wuu iska bixiyay)”
NJB “Butros dharkiisii ayuu guntaday (waayo waxba muu xidhnayn)”

Dadku Falastiin dhexdeeda qarnigii koobaad waxay ku xidhan jireen goyaal iyo dhar hoosaad dhaadheer, Butrosna maryihii dibadda wuu iska dhigay oo kuwiisii hoosana wuu faydnaa.

▣ **“Waa Sayidkii”** erayga *kurios* waxa loo adeegsaday hadalka ixtiraamku ku jiro sida sayid iyo Rabbi iyadoo la tilmaayo Ilaahnimada Ciise ee buuxda. Aayaddan dhexdeeda kalluumaystayaashu waxa ay garteen in qofkaasi yahay Sayidkii ammaanta lagu sarakiciyay!

Tarjumaadda middani waxay ka imanaysaa adeegsigii Axdiga Hore, halkaasoo YHWH loo tarjumay Rabbi/Sayid. Yuhuuddu magacan waxay ka dhigi jireen magac quduusa oon lagu hadli karin, sidaasi darteedna waxa lagu bedelay erayga ah *Adonai*, ama *kurios*. Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:19.

Marka la eego Filiboy 2:9-11 magaca “Sayid” waxa uu ka sarreeyaa magac kasta, waxaanu ka qayb ahaa qirashada baabtiiska inuu “Ciise yahay Rabbi” (Rooma 9-13).

▣ **1:8 “xertii kale”** xertu waxay raaceen Butros iyaga oo rabay inay soo kalluumaystaan isla markaan helaan xooga qarash ah (maxaa yeelay kumay tiirsanaan karin dumarkii la socon jiray Ciise).

▣ **“shabaggii kalluunka.”** Xitaa wakhtigan danbe Ciise ilaa hadda waxa uu

1. Dhisayay rumaysadkooda
2. Siinayay waxay u baahan yihiin
3. Ansixinayay sarakicistiisa iyo awooddiisa

NASB (UPDATED) TEXT: 21:9-14

⁹Haddaba markay dhulkii u soo degeen waxay arkeen dab dhuxul ah iyo kalluun saaran iyo kibis. ¹⁰Markaasaa Ciise ku yidhi iyagii, Keena qaar kalluunkaad hadda soo qabateen. ¹¹Haddaba Simoon Butros ayaa sixiimaddii fuulay, oo wuxuu xagga dhulka u jiiday shabaggii oo ka buuxa boqol iyo saddex iyo konton kalluun oo waaweyn, oo in kastoo ay faro badnaayeen shabaggii ma dillaacin. ¹²Markaasaa Ciise wuxuu iyaga ku yidhi, Kaalaya oo quraacda. Oo xertii midkoodna kuma UU dhicin inuu yidhaahdo, Kumaad tahay? waayo, waxay garanayeen inuu Sayidka yahay. ¹³Kolkaasaa Ciise yimid oo qaaday kibistii oo siiyey iyaga, kalluunkiina sidoo kale. : ¹⁴Taasu waa markii saddexaad oo Ciise xertii isu muujiyey markii uu kuwa dhintay ka soo sara kacay dabadeed.

21:9 “dab dhuxul ah iyo kalluun saaran iyo kibis” ujeedada quraacda subuxu waxay ahayd is weheshi, ujeedooyinka fiqi ahaaneedna waxay ahaayeen

1. Waxay la tacaalaysay inkiristii Butros iyo dab kaloo dib loo shiday (18:18). Tilmaamista dabkuna waxay kusoo aroortay labadan meelood oo keliya.
2. Yooxanaa Injiilkiisa iyo waraaqdiisa horeba wuxuu u qoray si loo waajaho waxbaristii beenta ahayd ee Gnostiga oo diidanayd aadanenimada Ciise.

21:10 aayaddan waxa kusoo arooraya labo erey oo kalluunka loo adeegsaday (1) aayadaha 9, 10, iyo 13 waana *opsarion*, oo ah kalluun yar iyo (2) aayadaha 6, 8 iyo 11 waan erayga *ichthus*, oo ah kalluun wayn. Macnahana waxay tusinaysaa iyagoo isku si loo adeegsaday.

21:11 “boqol iyo saddex iyo konton” macnuhu tusin maayo muhiimad ay tiradu sheegayso, waxaana weeyi oo keliya faahfaahinta markhaatiga goob jooga ah. kaniisaddii hore oo fasiri jirtay nambarrada ayaa ka dhigaysa nambarkani inuu sheegayo:

1. Sida uu aaminsan yahay Cyril 100 ku waxa uu tilmaamayaa ummadaha, 50 kuna Yuhuudda 3 duna waa Saddexmidnimada
2. Augustine ayaa isna rumaysan in nambarku uu sheegayo tobanka amar, iyo hadiyadaha Ruuxa Quduuska ah ee todobada ah. haddii markaa la isu geeyo namburada 1, 2, 3, 4 ilaa 17 waxay noqonaysaa 153. Sidoo kale Augustine waxa uu yidhi, tani waa tirada buuxda ee dhammaan kuwii Masiixa ugu yimid sharciga iyo nimacada.
3. Jerome ayaa isna sheegay in nambarka 153 inuu tilmaamayo noocyada kalluunka, waxaanu ka dhigan yahay imaatinka ummadahu u imanayaan Masiixa. Tani dariiqa fasiraadda mana aha ujeedadii qoraaga asalka ah!

▣ **“in kastoo ay faro badnaayeen shabaggii ma dillaacin.”** Waa tilmaanta markhaatiga goob jooga ah amaba waxay ahayd mucjiso.

21:14 “**Taasu waa markii saddexaad oo Ciise xertii isu muujiyey**” waxa ay tilmaamaysaa labadii isu muujineed ee lagu diiwaan geliyay cutubka 20 iyo tan oo saddex isku ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 21:15-19

¹⁵Haddaba markay quraacdeen dabadeed Ciise wuxuu Simoon Butros ku yidhi, Simoon ina Yoonisow, kuwan ma iga jeceshahay? Wuxuu ku yidhi, Haah, Sayidow, waad og tahay inaan ku jeclahay. Markaasuu ku yidhi, Baraarkayga daaji. ¹⁶Haddana wuxuu mar labaad ku yidhi isaga, Simoon ina Yoonisow, ma i jeceshahay? Wuxuu ku yidhi, Haah, Sayidow, waad og tahay inaan ku jeclahay. Markaasuu ku yidhi, Idahayga ilaali. ¹⁷Markii saddexaad ayuu ku yidhi, Simoon ina Yoonisow, Ma i jeceshahay? Butros ayaa ka calool xumaaday, waayo, wuxuu markii saddexaad ku yidhi, Ma i jeceshahay? Markaasuu ku yidhi, Sayidow, wax walba waad og tahay, waadna garanaysaa inaan ku jeclahay. Ciise ayaa ku yidhi, Idahayga daaji. ¹⁸Runtii, runtii, waxaan kugu leeyahay, Markaad yarayd adigu waad guntan jirtay, oo waxaad mari jirtay meeshaad doonaysay, laakiin markaad gabowdid, gacmahaad kala bixin doontaa, oo mid kalaa kuu guntin doona, oo wuxuu kuu qaadi doonaa meel aadan doonayn. ¹⁹Wuxuu waxaas u yidhi inuu tuso dhimashadu Ilaah ku ammaani doono. Markuu waxaas yidhi dabadeed, wuxuu ku yidhi, I soo raac.

21:15 “**Simoon ina Yoonisow**” u fiirso iyada oo Ciise aanu ugu yeedhin “Simoon Butros, ” maxaa yeelay wax kasta wuu ahaa marka laga reebo dhagax!

Qoraal gacmeedyadu waxay isku khilaafsan yihiin Butros magaca aabbihiis.

1. Yooxanaa – a¹, B, C*, D, L W
2. Joon – A, C²
3. ka tegis – x*

UBS⁴ waxa uu #1 ku qaadanayaa “B” da isagoo ku tirinaya (hubaal) raacayana 1:42 (P⁶⁶, P⁷², x, B*, L, W).

▣ **“jacayl..jacayl...jacayl”** waxa muuqata soo noqnoqosho saddex jeera oo ku habboona inkiritaanii Butros ee saddexda ahaa (18:17, 25, 27). Waxa jira kala duwanaansho iyo sinaansho qoraalkan ah

1. Jacayl (*phileō*) iyo jacayl (*agapaō*)
2. Baraar iyo ido
3. Garasho (*ginoskōō*) iyo ogaansho (*oida*)

Waxa jira dood ku saabsan kala duwanaanshaha ereyadan, hadiyo goorma Yooxanaa kala duwanaanshaha ayuu ku adeegsaday cutubkan (labo eray oo “carruur, ” “doon, ” iyo “kalluun”). Waxaanay u muuqataa inagoo arkayna kala soocnaan macnaha ka dhex muuqanaysa *agapao* iyo *phileō*, laakiin masii kala fogayn karno, maxaa yeelay labada eray luqada Koinka ee Giriigga waa isku mid (3:35; 5:20; 11:3, 5).

▣ **“kuwan ma iga jeceshahay?”** macnaha luqa ahaaneed maaha caddaan, qaar ayaana rumaysan in u jeedadu tahay:

1. Shaqada kalluumaysiga
2. Xasuusinta Butros markii hore ee uu sheegay inuu kuwa kale ka jecelyahay Ciise (Matayos 26:33; Markos 14:29 iyo Yooxanaa 13:37)

3. Lagama maarmaanimada inuu adeege u noqdo dhammaan (Luukos 9:46-48; 22:24-27)

▣ **“Baraarkayga daaji.”** Waa fal amar ah oo ku dhisan garasho. Qaab dhismeedka luqa ahaaneed ee ereyadan saddexda jeer soo arooray waa isku mid (aayadaha 16 iyo 17), laakiin waa erayo kala duwan (daaji idahayga iyo daaji baraarkayga).

21:17 “Sayidow, wax walba waad og tahay” Burtos waxa uu bilaabayaa inuu hadalka dedejiyo. Waxa aanu halkan ku cabirayaa fahan wanaagsan (2:25; 6:61, 64; 13:11; 16:30).

▣ **“waadna garanaysaa inaan ku jeclahay”** waxa jira is bedel erayga Giriigga ah ee “garasho” oo u dhexeeya aayadaha 16 (*oida*) iyo 17 (*oida* iyo *ginoskō*). Sababta arrintan ka danbaysana lama garan karo.

21:18 “gacmahaad kala bixin doontaa” waxa ay noqon kartaa erayo loo adeegsaday (1) kaniisaddii hore iyo (2) suugaanta Giriigga ee “iskutallaab ku qodbista.”

21:19 “inuu tuso dhimashaduu Ilaah ku ammaani doono.” waxa dhaqanku sheegayaa in Butros gedis gedis iskutallaabtaa loogu qodbay. *The Ecclesiastical History*, vol 3:1, ayaa Eusebiusa waxa uu ku leeyahay “Butros waxa uu rumaysnaa inuu Masiia ku wacdiyay Pontius, Galatia, Bithynia, Cappadocia, iyo Asia ilaa iyo Yuhuudda Dibadda. Markuu tegay Roomana iskutallaabtaa ayaa loogu qodbay gedis gedis isagoo dalbaday sidaas.” Eeg Fiirada 1:14.

▣ **“I soo raac”** waa fal amar ah sida aayadda 22 oo kale. hadalkanina waxa uu dhammays tiraya Butros oo booskiisii loosoo celiyay (Matayos 4:19-20).

NASB (UPDATED) TEXT: 21:20-23

²⁰Butros markuu jeestay wuxuu arkay kii xerta ahaa oo Ciise jeclaa oo daba socda; isagu wuxuu ahaa kii laabta Ciise ku tiirsanaa wakhtigii cashada oo ku yidhi, Sayidow, waa kuma kan ku gacan gelin doonaa? ²¹Haddaba Butros markuu arkay, wuxuu Ciise ku yidhi. Sayidow, kanna ka warran? ²²Ciise wuxuu ku yidhi, Haddaan doonayo inuu joogo ilaa aan imanayo, maxaa kaa galay? Adigu i soo raac. ²³Haddaba waxaa walaalaha ku dhex faafay hadalkaas oo leh, Kaas oo xerta ka mid ahaa ma dhiman doono. Laakiin Ciise kuma odhan, Ma dhiman doono, wuxuuse yidhi, Haddaan doonayo inuu joogo ilaa aan imanayo, maxaa kaa galay?

21:20 “kii xerta ahaa oo Ciise jeclaa” hadalkani waxa uu tilmaamayaa waxa kusoo arooray 13:25. Waxa aan caddayn sababta hadalkan loo adeegsaday iyadoo Yooxanaa la tilmaamayo (13:23; 19:26; 20:2; 21:7, 20). Aragtiyaha suurta galka ahi waa:

1. Qoraallada Yuhuudda ee qarnigii koobaad qoraaga magaciisa kumay sheegi jirin
2. Yooxanaa waxa uu ahaa dhallin yaro markii uu rumaystay Ciise
3. Yooxanaa waxa uu ahaa xerowga keliya ee Ciise la socday markii la maxkamadaynayay iyo markii iskutallaabtaa lagu qodbayay.

21:22 “ Ciise wuxuu ku yidhi, Haddaan doonayo inuu joogo ilaa aan imanayo, maxaa kaa galay” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah. ujeedadu waxay tahay inaan adeegsano hadiyadeheenna iyo adeeggeena, mana aha in muhiimadda la saaro waxa Ilaah u diyaarshay kuwa kale! sababaha suurto galka ah ee ku darista cutubka 21, waxa weeyi iyadoo si qaldan loo fahmay Yooxanaa oo nool ilaa imaatinka Masiixa ee Labaad. Yooxanaa waxa uu ka hadlayaa *Parousia*, (14:23; 1 Yooxanaa 3:2).

▣ **“I soo raac”** waxa ay soo koobaysaa yeedhitaanka gaar ahaaneed ee Injiilka Yooxanaa (1:43; 10:27; 12:26; 21:19.22). erayadanina waxay adkaynayaan ka jawaaba celinta shakhsi ahaaneed ee Injiilka, halka erayada “rumaysa inuu” ay ka adkaynaso waxa uu koobsanayo Injiilku.

NASB (UPDATED) TEXT: 21:24

²¹Kan weeye kii xerta ahaa oo u marag furay waxyaalahan, oo qoray waxyaalahan, oo waxaannu garanayna maraggiisu inuu run yahay.

21:24 “qoray waxyaalahan” tani ma waxa ay tilmaamaysaa (1) aayadaha 20-23; (2) cutubka 21; ama (3) Injiilka oo dhan? Jawaabta lama hubo.

▣ “waxaannu garanayna maraggiisu inuu run yahay” garan mayno cidda loogala jeedo jamcinta hadalka, laakiin waxa loo badanayaa inay tilmaamayso odayaashii Efesos, halkaasoo Yooxanaa uu ku noolaa kuna dhintay. Dhaqankuna waxa uu sheegayaa in odayaashii Efesos inay Yooxanaa oo da’diisu waynayd ku dhiirri geliyeen inuu Qoro Injiilka maadaama oo Rasuulladii kale ay dhinteen, sidoo kalena waxa soo if baxayay waxyaabo bidco ah oo la xidhiidhay Masiixa. eeg Mawduuca Gaarka ah 1:8.

NASB (UPDATED) TEXT: 21:15

²¹Waxaana jira waxyaalo badan oo kale oo Ciise sameeyey, oo haddii mid mid loo wada qoro, waxaan u malaynayaa inaan dunidu qaaddeen buugagga laga qoro.

21:25 ka hadalka aayaddan 25 waxa uu ku wareegayaa labo sababood: (1) kuwo ka mida qoraal gacmeedyada Giriigga Yooxanaa 7:53-8:11 waxa uu kusoo aroorayaa labada aayadood ee 24 iyo 25 dhexdooda (2) qoraal gacmeedka Sinaiticus (a) aayadda 25 waa la tiray haddana waa lasoo celiyay. Arrintan waxa lagu gartay markii matxaf ku yaalla Ingiriiska loogu adeegsaday ekis ray. Aayaddani waxay adkaynaa in qoraayada Injiilku in ay doorteen waxa ay diiwaan gelinayeen. Su’aasha la is waydiin karaana waxay tahay: “Maxay sidan ugu qoreen oo hal Injiil ay ugu kulmin waayeen?” (eeg Gordon Fee iyo Douglas Stuart, *How To Read the Bible For All Its Worth*).

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu yahay isu ekaanshaha u dhexeeya Yooxanaa 21 iyo Luukos 5?
2. Maxay xertu Ciise hore ugu garan waayeen?
3. Kumuu ahaa kii xerta ahaa ee Ciise jeclaa?
4. Muxuu Ciise saddex jeer u waydiiyay Butros inuu jecelyahay?
5. Ciise miyuu sheegay in Yooxanaa uu noolaan doono ilaa sonoqoshadiisa Labaad?
6. Kuma ayay tilmaamysaa aayadda 24?
7. Aayadda 25 ma asal baa?

1 YOOXANAA

HORDHACA 1 YOOXANAA

KELINIMADA WARAAQDA

- A. Waraaqdani maaha mid gaara oo loo qoray kaniisad keliya, sidoo kalena maaha waraaq ka socota xafiis Madaxtooyo.
1. Kuma bilaabmayso hordhac dhaqameed (ka qoray iyo cidda loo qorayo)
 2. Kuma bilaabmayso salaan cid la salaamayo sidoo kalena farriin gaara oo xidhitaan ahi ma jirto
- B. Warqadda kuma soo aroorayaan magacyo dad, waana arrin aan caadi ahayn marka laga reebo kitaabada loo qoray wax ka badan hal kaniisad, sida Efesos iyo Yacquub. Axdiga Cusub dhexdiisa kitaabka Cibraaniyadda oo keliya ayaan sheegaynin cidda qortay, laakiinse waxa muuqata in loo qoray rumaystayaal ay dhibaato ka haysatay macallimiin been ah.
- C. Waraaqda ama kitaabku waxa uu ka hadlayaa arrin fiqi ahaaneed oo khusaysa afar mawduuca
1. Ciise waxa la xidhiidha
 - a. Ilaah buuxa iyo aadane buuxa
 - b. Badbaadadu waxay ku timaaddaa rumaysadka Ciise Masiix
 2. Dalabka nololaha ku dhisan ku dayashada Masiixa (saddex tijaabo oo Masiixiyadda asalka ah u ahaaday)
 - a. Isjacaylka walaalaha
 - b. Addeecitaanka
 - c. Diidmada nidaamka dunida leexatay
 3. Badbaadada weligeed ah oo ku timaadda rumaysadka Ciisihii reer Naasereet (erayga “garasho” waxa la adeegsaday 27 jeer)
 4. Sida lagu garto macallimiinta beenta ah
- D. Qoraallada Yooxanaa waxa lagu tiriyaa (gaar ahaan waraaqda hore) xagga luqada Giriigga qoraallada ugu fudud, iyadoo sidaas ahn waxa ay ku soconaysaa xaqiiqooyinka la xidhiidha Ilaah iy Ciise Masiix (Ilaah waa Nuur, 1|:5; Ilaah waa Jacayl, 4:8, 16; Ilaah waa Ruux, Yooxanaa 4:24).
- E. Waxa suurto gal ah in waraaqdan loo qoray iyadoo hordhac u ah Injiilka Yooxanaa, halkaasoo bidcadii Gnostiga ee soo daahirtay qarnigii koobaad uu Injiilku kaga saabsanyahay. Halka waraaqda looga qoray kuwa aan rumaysadka lahayn, ayaa haddana waxa ay tahay mid u socota rumaystayaasha. Westcott ayaa sheegaya, in halka Injiilka Yooxanaa uu ka adkaynayo Ilaahnimada Ciise, ay waraaqda koobaadna ka adkaynayso bani aadananimadiisa. Labadan kitaabna way is dhammays tarayaan!
- F. Yooxanaa waxa uu wax u qorayaa “caddaan iyo madow” taasi oo macneheedu yahay inuu adeegsanayo erayo labo labo ah, qaabkanina waa sida qoraallada laga helay Badda Dhimatay iyo waxbaristii macallimiintii Gnostiga. Waraaqda koobaad ee Yooxanaa waxay ka koobantahay suugaan labo labo ah ha ahaato dhinaca erayada (nuur iyo mugdi) ama dhinaca wax sheegista (hadal diidmo ah oo uu la socdo mid oggolaansho ah), waana arrin ka duwan sida aan ka helayno Injiilka Yooxanaa oo aan ka arkayno labo laboda isla socota (kor iyo hoos).

- G. Waxa adag in la helo meelo laga jarjari karo waxa ku qoran waraaqdan, maxaa yeelay waxay koobsanaysaa mawduucyo isku mida oo soo noqnoqonaya (eeg Bill Hendricks, *Tapestries of Truth, The Letters of John*).

QORAAGA

- A. Qoraaga warqaddan waxa jirta doodo ku saabsan sida cidda qortay Injiilka Yooxanaa iyo saddexdiisa waraaqood iyo sidoo kale Muujintii.
- B. Labo aragtiyood oo asaasi ah
1. Aragti dhaqameedka
 - a. Dhaqanku waxa uu caddaynayaa in waraaqdan uu iska lahaa Rasuul Yooxanaa
 - b. Aragtiyaha wadaadadii kaniisadda oo kooban
 - (1) Clement ga Roomaanka ahi (C.D. 90) wuxuu ku sheegayaa I Yooxanaa
 - (2) Polycarp ka Smyrna, wuxuu ku soo xiganayaa warqaddiis *Filiboy 7* (C.D. 110-140).
 - (3) Justin Martyr ayaa warqaddan wax kagasoo xiganaya kitaabkiisa *Dialogue 123:9* (C.D. 150-160)
 - (4) Waxyaalo ku saabsan I Yooxanaa waxa lagusoo qaatay
 - (a) Ignatius kii Antiokh (taariikhda qoraalkiisa lama hubo C.D. 100)
 - (b) Papias kii Hierapolis (dhashay intii u dhaxaysay C.D. 50-60 waxaanu shahiiday C.D. 155)
 - (5) Irenaeus kii Lyons (C.D. 130-202) ayaa waraaqdan u tirinaya Rasuul Yooxanaa, halka Tertullian, oo difaaci jiray Masiixiyaddu isagoo qoray 50 kitaab uu wax kagasoo xigtay I Yooxanaa
 - (6) Kuwo ka mida qoraaladii hore ayaa waraaqdan u tirinaya Yooxanaa sida Clement, Origen, iyo Dionysius, iyo dhammaanba kuwii Aleksandariya, Muratorian Fragment (C.D. 180-200), iyo Eusebius (qarnigii saddexaad).
 - (7) Jerome (qaybtii labaad ee qarnigii afraad) ayaa warqadda u tirinaya Yooxanaa, laakiin wuxuu sheegayaa in kuwo wakhtigiisii joogay ay diiddanaayeen.
 - (8) Theodore kii Mopsuestia, oo ahaa Wadaadkii Antiyokh (C.D. 392-428), ayaa diiday inuu waraaqdan Yooxanaa qoray.
- C. Haddii Yooxanaa uu yahay qoraaga maxaynu ka garanaynaa?
- (1) Waa wiilkii Sebede iyo Saloome
 - (2) Waxa uu kaluumayste ka ahaa baddii Galiili isaga iyo walaalkii Yacquub (waxa suuro gala inay doonyo lahaayeen)
 - (3) Qaar ayaa rumaysan in ay hooyadiis walaal la ahayd Maryantii Ciise dhashay (Yooxanaa 19:25; Markos 15:20)
 - (4) Waxa laga yaaba inuu hodan ahaa, maxaa yeelay wuxuu lahaa
 - (a) Adeegayaal (Markos 1:20)
 - (b) Doonyo dhowr ah
 - (c) Guri uu Yerusaaalem ku lahaa (Matayos 20:20)
 - (5) Waxa uu ahaa qof caana oo dadku ixitiraamaan, waxaana u suurto gashay inuu booqdo gurigii Wadaadka Sare ee Yerusaaalem dhexdeeda (Yooxanaa 18:15-16).
 - (6) Isaga ayaa daryeelayay Ciise hooyadiis.
- D. Dhaqankii kaniisaddii hore waxa uu ka markhaati kacay, in uu noolaa in kabadan Rasuulladii klae, kaddib markii Maryan ay dhimatayna waxa uu u wareegay Aasiyada Yar, sidoo kalena waxa uu degay Efesos, oo ahyad magaaladii goobtaas ugu waynayd. Efesosna waxa looga mastaafuriyay jasiiradda Patmos (xeebta u dhow), kaddibna waa la sii daayay waxaanu kusoo laabtay Efesos (Eusebius oo kasoo xiganaya Polycarp, Papias iyo Irenaeus).
2. Aragtida casriga ah
 - a. Waxa badanaa la isku waafaqsan yahay in ay aad isugu eegyihiin kitaabada loo tiriyay inuu Yooxanaa qoray, marka laga eego erayada iyo qaabka hadalka. Tusaale ahaan adeegsiga erayada liddiga isku ah: nolosha iyo dhimashada, xaqa iyo baadilka. Waxayna ahayd waxyaalihii ay koobsanayeen qoraaladii macallimiintii Gnostiga ee beenta ahaa wakhtigaasna joogay.
 - b. Waxa jira aragtiyo la xidhiidha shanta kitaab ee la sheego inuu Yooxanaa qoray, qaar ayaana rumaysan inuu jiraa qoraa keliya ama laba qoraa amaba saddex qoraa. Waxay u muuqataa sida loo badaniyo, in dhammaanba qoraallada loo tiiriyo Yooxanaa inay yihiin natiijo ka dhalatay fikirka shakhsi keliya, inkastoo ay suurto gal tahay in xer dhowr ahi ay hore u qoreen.

c. Anigu waxaan rumaysanahay in Rasuul Yooxanaa oo da'diisu wayntahay uu qoray shanta kitaabba wakhtiyadii ugu dambaysay adeeggiisa Efesos.

3. Arrinta khusaysa garashada qoraagu waxay la xidhiidhaa fasiraadda mana aha waxyiga, sidaasi darteedna qoraaga keliya ee Kitaabka Quduuska ahi waa Ilaah.

TAARIKHDA – waxay la xidhiidhaa qoraaga

- A. Haddii Yooxanaa yahay qoraaga Warqadaha, gaar ahaan 1 Yooxanaa, wakhtiga la qoray waa ku dhawaad dhammaadkii qarnigii koobaad. Wakhtigani waxa uu saamaxayaa wakhti ku filan horumarka fikirkii Gnostiga ee fiqi ahan iyo falasad ahaan labadaba. Sidoo kalena waxa uu waafaqayaa adeegsiga Yooxanaa ee erayda “carruurey” isagoo u muuqday qof da'diisu wayntahay oo la hadlayay jiiil rumaystayaasha ah oo da'doodu yar tahay. Jerome ayaa sheegaya in Yooxanaa uu noolaa 68 sano iskutallaab ku qodbistii Masiixa dabadeed, waxaanay tani waafaqaysaa dhaqankii kaniisadda.
- B. A. T. Robertson ayaa u malaynaya in 1 Yooxanaa la qoray intii u dhexaysay C.D. 85-95, halka Injiilka Yooxanaa laga qoray C.D. 95.
- C. I. Howard Marshall ayaa kitaabkiisa *The New International Commentary Series on 1 John* ku sheegaya in taariikhda u dhexaysa 60-100 C.D. ay tahay muddo caqli galka ah ee lagu qiyaasi karo qoraallada Yooxanaa.

CIDDA LOO QORAY

- A. Dhaqanku waxa uu sheegayaa in kitaabkan loo qoray gobolkii Roomaanka ee ku yaallay Aasiyada Yar (galbeedka Turkiga), halkaasoo Efesos ay ahayd magaalada ugu muhiimsan.
- B. Waxay u muuqataa in kitaabkan loo qoray tiro kooban oo ahaa kaniisadihii ku yaalla Aasiyada Yar, kuwaasi oo ay dhibaato ka haystay macallimiintii beenta ahaa (sida Kolosay iyo Efesos), gaar ahaan
1. Waxbaristii Gnostiga ee waafaqsanayd Ilaahnimada Ciise balse diidaysay inuu yahay bani aadam
 2. Waxbaristii Gnostiga ee diidanayd sharciga laga soocay fiqiga akhlaaqda
- C. Augustine (qarnigii afraad) ayaa sheegaya in loo qoray Parthians ka (Baabeloon), waxaana sidaas ku raacay Cassiodrus (horraameeyadii qarnigii lixaad). Waxaana loo badanayaa sababta sidan loo aaminay inay tahay, isku khaldista erayada “ta la doortay, ” iyo erayada “ta ku sugan Baabeltii la doortay, ” kuwaasi oo lagu adeegsaday 1 Butros 5:13 iyo 2 Yooxanaa 1.
- D. Muratorian Fragment, oo ah liiska magacyada Axdiga Hore laguna qoray Rooma 180-200 C.D. ayaa sheegaysa in kitaabkan la qoray “kaddib markii uu wacdiyay xertiisii iyo wadaadadii” (Aasiyada Yar dhexdeeda).

BIDCADA

- A. Waxaan shaki ku jirin waraaqdu ay ka jawaab celinaysa waxbaris been ah (“haddaan nidhaahno..” 1:6ff iyo “kuwa leh..” 2:9; 4:20).
- B. Waxa suurto bidcada ku sugan kitaabkan inaan ka garano
1. Diidmada Ciise oo jidh soo qaatay
 2. Diidmada Ciise oo badbaadada dhex u ah
 3. Yaraanshaha nolosha ku dhisan lamidnimada Masiixa
 4. Adkaynta garashada (hadiyo goor iyadoo sir ah)
 5. Ujeedsashada xagga koobsashada
- C. Asalka taariikheed ee qarnigii koobaad
Dunidii Roomaanka ee qarnigii koobaad waxa uu ahaa meesha ay isugu yimaadaan diimaha galbeedka iyo barigu, waxaana halkaas caan ku ahaa ilaahyada Roomaanka iyo Giriigga, sidoo kalena diimaha qarsoon ayaa caan ahaa, maxaa yeelay waxay adkaynaysay xidhiidhka shakhsi ahaaneed ee ilaanimada iyo garashada qarsoon. Falsafada Giriigga ah ee diinta ahayn ayaa iyaduna caan ahayd iyadoo waxyaalo kale ku dhex dhafan. Dadka noocan ahaa ayaa waxa kasoo dhex baxday rumaysadkii Masiixiyadda (Ciise oo ah jidka keliya ee Ilaah loo mari karo, Yooxanaa 14:6). Si kastoo haddaba bidcadani ahayd, waxa la isku dayay in Masiixiyadda caqli gal looga dhigo fikirkii Giriigga iyo Roomaanka.
- D. Doorashooyinka kooxihii Gnostiga ahaa ee Yooxanaa uu la hadlayay
1. Gnostiga ugu horraysay
 - a. Waxay u muuqataa waxbarastii asaasiga u ahayd Gonostigii qarnigii koobaad, inay adkaynaysay jiritaanka labada waxyaalood ee ruuxa iyo maaddada, waxaanay ruuxa kasoo qaadeen (Ilaaha Sare) inuu wanaagsan yahay, halka maadadu ay ka tahay shar xun. Caqiidadani waxay u dhigantaa tii Platonism ka ee kasoo horjeeday waxa maaddiga ah, iyo waxa samaawiga ah ee kasoo horjeeda dhulka, iyo waxa la arkayo oo kasoo horjeeda waxa aan la arkayn. Waxa kaloo

waxbarista sii kordhaysay ka mid ahaa, muhiimadda ay leedahay garashada sirtu si loo helo badbaadada iyadoo la adeegsanayo furayaal sir ama qarsoodi ah oo nafta u saamaxaysa, inay marto marxalado iyo dabaqado malaa'igta ah (*aeons*) si loo gaadho Ilaah sare.

- b. Waxa jira labo qaab oo ahaa Gonistigii hore isla markaana Kitaabkani sheegayo
- (1) Donetic Gonotis ka, kuwaas oo diidanaa inuu Ciise yahay aadane waayo maaddadu waa shar.
 - (2) Cerinthian Gnostiga, oo rumaysnaa in Masiixu uu yahay mid ka mida dabaqyada malaa'igta u dhexaysa Ilaah iyo maaddada sharka ah, marka loo eego fikirkan Gnostigga ahna "Ruuxa Masiixu" waxa uu dhex digay Ciise oo aadane ah wakhtigii baabtiiska isagoo markaasna ka tegay intii aan iskutallaabtaa lagu qodbin kahor.
 - (3) Kuwo ka mida Gonosiyaanta ayaa samayn jiray dhowrsanaan iyo inay nolosha quduus iskaga dhigaan, iyaga oo aamminsanaa in waxkasta oo jidhku rabaa uu shar yahay, halka kuwo kalena ay ka samayn jireen nolol ka madhan sharciga, iyaga oo sheeganaya in jidhka la siiyo waxkasta oo uu rabo. Ma hayno caddaymo qoraala oo tusinaya fikirka Gonostigu siduu ku horu maray qarnigii koobaadn, sidoo kalena caddaymo lagu kalsoonyahay may sheegin ilaa qarnigii labaad. Si warbixin dheeraada oo ku saabsan bidcadii Gonistigga ee maraajicdan:
 - (a) *The Gnostic Religion*, oo uu leeyahay Hans Jonas, Beacon Press
 - (b) *The Gnostic Gospels*, oo uu leeyahay Elaine Pagels, Random Press
 - (c) *The Nag Hammadi Gnostic Texts and the Bible*. Oo uu leeyahay Andrew Helmbold
2. Ignatius ayaa ku sheegaya qoraalladiisa ku socda reer *Smyrnaeans* iv-v waxkale oo ku saabsan caqiidadii Gnostiga isagoo sheegaya inay diiday jidhnimada Masiixa, waxaanay noolaayeen nolol aan lahayn akhlaaq.
3. Waxa jira rayi kale oo ku saabsan meesha bidcadani ka timid, laakiinse badanaa aad looma xoojiyo, waxaana weeyi Meander kii Atiokh oo lagu yaqaano qoraalladda Iranaeus, *Against Heresies* XXIII, kaasi oo raacsanaa Simon kii reer Samaariya oo difaaci jiray garashada qarsoodiga.
- E. Bidcada Gnostigga ee maanta
1. Bidcadani waxay imanaysaa marka dadku isku dayaan runta Masiixa inay dhex geliyaan nidaamyo iyo fikiro kale.
 2. Waxa uu imanayaa marka dadku isku dayaan inay adkeeyaan caqiidooyinka saxda ah ee ku saabsan xidhiidhka Ilaah lala leeyahay iyo nolosha rumaysadka ee akhlaaq ahaaneed.
 3. Waxa uu imanayaa marka dadku isku dayaan inay Masiixiyadda u bedelaan diin gaar ah oo fikir ku xidhan
 4. Waxa uu imanayaa marka dadku ay isu rogaan kuwo ku dhisan bidco iyo akhlaaq la'aan.

UJEEDADA

- A. Kitaabku waxa uu sidaa ujeedo la rabo in rumaystaashu ay ku dhaqmaan:
1. Inay farxad siiso (1:4)
 2. Inay ku dhiirri geliso nolosha cibaadada (1:7; 2:1)
 3. Inay is jeclaadaan (4:7-21) oonay dunida jeclaamin (2:15-17)
 4. Inay siiso damaanad qaadka badbaadooda ku sugan Masiixa (5:13)
- B. Kitaabku wuxuu rumaystayaasha u sidaa ujeedo caqiido ahaaneed
1. Diidmada waxbarista beenta ah ee kala saaraysa I laahnimada iyo aadananimada Ciise.
 2. Diidmada waxbarista beenta ah ee ruuxiga ka dhigaysa fikir taagan oo ka soocan nolosha akhlaaqiga ah.
 3. Diidmada waxbarista beenta ah ee sheegaysa inuu qofku ku badbaadi karo si ka duwan kuwa kale.

AKHRINTA TAXANAHA KOOBAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Kitaabka oo dhan waxa aad ku akhridaa hal kal fadhi, waxaanad lasoo baxdaa oo ereyadaada ku cabirtaa ujeedada gebi ahaanba kitaabku ka hadlyo

1. Ujeedada gebi ahaanba kitaabka
2. Qaabka qoraalkiisa (nooca)

AKHRINTA TAXANAHA LABAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Marlabaad kitaabka akhri waxaanad soo saartaa ujeedada muhiimka ah adigoo ku cabiraya hal jumalada.

1. Cinwaanka cutubka kowaad
2. Cinwaanka cutubka labaad
3. Cinwaanka cutubka saddexaad
4. Cinwaanka cutubka afraad
5. Iwm.

I YOOXANAA 1:1-2:2

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ereyga nolosha	Wixii la maqlay, la arkay ee la taabtay	Hordhac	Erayga nolosha	Jidh noqoshada ereyga iyo wax la wadaagista Aabbaha iyo Wiilka
1:1-4	1:1-4	1:1-4	1:1-4	1:1-4
Ilaah waa Nuur	Aasaaska weheshi la yeelashadiisa	Fikirka saxsan ee ku waajahan denbiga	Ilaah waa Nuur	Ku socoshada Nuurka (1:5-2:28)
1:5-10	1:5-2:2	1:5-10	1:5-7 1:8-10	1:5-7 Shuruudda ugu horraysa ee goynta denbiga 1:8-2:2

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA GUUD

- A. Cutubkani waxa uu la xidhiidhaa bilowga Injiilka Yooxanaa (1:1-18, ka hor Bilowgii), taasi oo la xidhiidha Bilowgii 1:1 (abuurkii). Si kastaba ha ahaatee, halkan waxa ay kaga hadlaysaa bilowgii adeegga Ciise.
- B. Waxa uu xoogga saarayaa
 1. Dadnimada Ciise ee buuxda
 - a. Adeegsiga ficillo iyo magacyo la xidhiidha dareenka dadka: aragga, maqalka, taabashada (aayadaha 1, 3). Ciise waxa uu ahaa aadane buuxa oo jidh leh.
 - b. Magacyo loo adeegsaday Ciise
 - (1) Ereyga nolosha (aayadda 1)
 - (2) Wiilkiisa Ciise Masiix (aayadda 3)
 2. Ilaahnimada Ciisihii reer Naasereet

- a. Jiritaankiisii hore (aayadaha 1, 2)
 - b. Jidh soo qaadashadiisii (aayadda 2)
- xaqiiqooyinkanina waxay u socdeen oo kasoo horjeedeen waxbaristii beenta ahayd.

ISKU XIDHKA WEEDHAHA

A. Aayadaha 1-4

1. Aayadaha 1-3a Giriigga waxay isku yihiin weedh qudha.
2. Falka ah “idiinka warramaynaa” ee aayadda 3 waxa uu tilmaamayaa farriinta wacdina tah.
3. Afar weedhood ayaa ku bilaabmaya aayadda 1 iyaga oo adkaynaya
 - a. “wixii bilowgii ahaa”
 - b. “wixii aan maqalnay”
 - c. “wixii aan indhahayaga ku aragnay”
 - d. “wixii aan aragnay ee ku taabanay gacmahayaga”
4. Waxay u muuqataa aayadda 2 inay tahay weedh dhinac ka ah wax khuseeya jidh soo qaadashada Ciise, xaqiiqadeeda naxwe ahaaneedna aragtida ayay soo jiidanaysaa!
5. Aayadaha 3 iyo 4 waxay xadidayaan ujeedooyinka wacdinta: is weheshiga iyo farxadda. Markhaatiga goob jooga hi waxay ahayd mid ka mida waxyaalihii ay ku dhisnayd kaniisaddii ugu horraysay.
6. U fiirso sida ay isu raacayaan falalka aayadaha 1
 - a. Aan buuxin (hore u jiray)
 - b. Buuxa (xaqiiqada taagan)
 - c. Falka tegay (tusaalayaal gaar ah)

B. Aayadaha 1:5-2:2

1. Magac u yaallada aayadaha 1:5-2:2 waa ay qarsoon yihiin, laakiin waxaan filayaa dhammaantood inay tilmaamayaan Aabbaha marka laga reebo aayadda 5 (waxay la mid yihiin Efesos 1:3-14).
2. Dhammaanba weedh shuruudeedyadu waa heerka saddexaad iyagoo tusinaya suurta galnimada xaqiijinta.
3. Waxa jira kala duwanaansho fiqi ahaaneed oo muhiim ah una dhexeeya
 1. Falalka wakhtiga jooga iyo falalka wakhtiga tegay ee “denbi”
 2. Kelida iyo jamcinta, “denbi” iyo “denbiyo”

BIDCOOLAYAASHA

- A. Waxyaalaha bidcoolasyaasha beenta ahi sheeganayaan waxaan ka arki karnaa 1:6, 8, 10; 2:4, 6, 9.
- B. Aayadaha 5-10 ayaa waxay tilmaamayaan isku dayista kala saarista garashada Ilaah (fiqi) iyo kuwo Ilaah raacsan (akhlaaqda), waxa aanay metelaysaa Gonistiyiinta oo ku adag waxyaalaha khuseeya garashada. Waxa lagama maarmaana kuwa Ilaah garanayaa inay qaabkiisa ka muujiyaan noloshooda.
- C. Aayadaha 1:8-2:2 waxa ay isu dheelli tir isla yihiin 3:6-9, waxaana weeyi labo dhinac oo isku qiimo ah, waxaanay diidayaan labo waxbarisa oo khaldan:
 1. Khalad fiqi ahaaneed (denbi ma jiro)
 2. Khalad akhlaaq ahaaneed (denbigu muhiim maaha)
- D. Aayadaha 2:1-2 waa isku day ah isu dheelli tirista denbiga oo la yaraysto iyo dhibaataada is xukumista, dhaqan ahaaneed iyo garasho ahaan.

BARASHADA EREYADA IYO WEEDHA AAYADAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 1:1-4

¹Waxaannu idiin soo qoraynaa wax ku saabsan wixii tan iyo bilowgii jiray, oo aannu maqalnay, oo aannu indhahayaga ku aragnay, oo aannu egnay, oo ay gacmahayagu taabteen oo Hadalka nolosha ah. ²Nolosha waa la muujiyey, oo waannu aragnay, waanan u marag furaynaa, oo waxaannu idiinka warramaynaa nolosha weligeed ah, ta Aabbaha la jirtay oo lanoo muujiyey. ³Wixii aannu aragnay oo aannu maqalnay ayaannu idiinka warramaynaa, si aad idinkuna noo soo wehelisaan; oo wehelnimadeennu waa mid la jirta Aabbaha iyo Wiilkiisa Ciise Masiix ah. ⁴Oo waxaannu waxyaalahan idiinku soo qoraynaa si ay farxaddiinnu u buuxsanto.

1:1 “wixii” Waxa uu kitaabku ku bilaabmayaa magac u yaa, isaga oo ka hadlayay labo dhinac oo khuseeya farriinta Ilaah:

1. Waxa la xidhiidha Ciise

2. Waxa la xidhiidha shakhsiyadda Ciise laftiisa (1:8, 10; 2:20, 24; 3:11, 14)

Injiilku waxa uu isugu jiraa farriin iyo shakhsi iyo qaab nololeed.

▣ **“jiray”** falka aan dhammayska tirnayni waxa uu tusinayaa jiritaankii hore ee Ciise (aayadda 2; Yooxanaa 1:1, 15; 3:13; 8:57-58; 17:5). Waa mid ka mida adkaynta Ilaahnimada Ciise, oo isagu waxa uu muujinayaa Aabbaha, maxaa yeelay ilaa Bilowgii Aabbaha ayuu la jiray.

▣ **“tan iyo bilowgii”** waxa ay si cad u tilmaamaysaa Bilowgii iyo Yooxanaa 1, laakiin halkan waxa loogala jeeday bilowgii adeegga Ciise (eeg Mawduuca Gaarka ah: Yooxanaa *Archē*1:1). Imaatinka Ciise muu ahayn qorshe bedelay mid hore u jiray, laakiinse Injiilku weligiisba waxa uu ahaa qorshaha Ilaah ee badbaadada (Bilowgii 3:15; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28; 13:29). Macnaha halkani haddaba waxa uu tusinayaa laga soo bilaabo ilaa markii Ciise uu la kulmayo Labo iyo Tobankii xerta ahaa.

Yooxanaa fahanka ah “bilowgii” (*archē*) hadiyo goor wuu adeegsanayaa, badanaa adeegsigiisuna wuxuu u janjeedhaa

1. Lagasoo bilaabo abuuritaankii

a. Yooxanaa 1:1, 2 (Ciise oo ahaa bilowgii)

b. Yooxanaa 8:44; 1 Boqorradii 3:8 (Shaydaanku ilaa bilowgii waa beenaale).

c. Muujintii 3:14; 21:6, 12 (Ciise waa bilowga iyo dhammaadka)

2. Lagasoo bilaabo jidh soo qaadashadii Ciise iyo adeeggiisii

a. Yooxanaa 8:25; 16:4; 1 Yooxanaa 2:7 [labo jeer]; 3:11; 2 Yooxanaa 5, 6 (waxbaristii Ciise)

b. Yooxanaa 15:27; 16:4 (la jiray Ciise)

c. 1 Yooxanaa 1:1 (lagasoo bilaabo adeeggi Ciise)

d. 1 Yooxanaa 2:13, 24 [labo jeer] (lagasoo bilaabo ilaa markii ay isku halleeyeen Ciise)

e. Yooxanaa 6:64 (lagasoo bilaabo diidistoodii Ciise)

3. Macnaha halkani waxa uu ku habboonyahay #2

MAWDUUC GAAR AH: YOOXANAA 1 OO LA BARBADHIGAY 1 YOOXANAA 1

Injiil

1. Bilowgii (1:1,2)

2. Eray (*logos*) (1:1)

3. Nolol (*zōē*) (1:4)

4. Nuurka Ciise (1:4)

5. Nuurka la muujiyay (1:4)

6. Mugdiga (1:5)

7. U markhaati furista nuurka (1:6-8)

8. Dadka loo keenay Ilaah (1:7,12-13)

9. Ammaantiisa la arkay (1:14)

Waraaq

Tan iyo bilowgii (1:1)

Eray (*logos*) (1:1)

Nolol (*zōē*) (1:1,2)

Nuurka Ilaah (1:5)

Nuurka la muujiyay (1:5)

Mugdiga (1:5)

U markhaati furista nuuka (1:3,5)

Dadka loo keenay Ilaah (1:3)

Ammaantiisa la arkay (1:1-3)

▣ **“anagu”** waxa ay tusinaysaa markhaatifurka gaar ahaaneed iyo jamaaco ahaaneed ee Rasuulladii. Yooxanaa waxa uu in ka badan 50 jeer waraaqdiisan ku tilmaamayaa markhaatiga jamaaciga ah. qaar ayaa u arka in magac u yaalka jamaca ahi uu tusinayo kuwii isaga ku xidhnaa, waana kuwii isaga fiqigiisa gaarka ah ku xidhnaa.

▣ **“maqalnay...aragnay”** waa labo fal oo dhammays tiran kuna dhisan garasho tusmayna xambaarsan. Yooxanaa waxa uu adkaynayaa dadnimada Ciise isaga oo in badan adeegsanaya erayada la xidhiidha dareemada shanta ah, waana sida ku sugan aayadaha 1, 3. Waxa uu tusinayaa inuu ahaa markhaati goob jooga oo arkay noloshii Ciisihii reer Naasereet.

▣ **“eegnay, oo ay gacmahayagu taabteen”** waa labo fal oo sidii fal tegay ah isla markaana tusinaya dhacdooyin gaar ah. erayga ah “eegnay” waxa ay tusinaysaa “daymo u yeelasho” (Yooxanaa 1:14), halka erayga “taabasho” loogala jeedo “dareen taabasho” (Yooxanaa 20:20, 27; Luukos 24:39).

▣ Erayga Giriigga ah ee “taabtay” ama “gacanta saaray” (*psēlaphaō*) Axdiga Cusub dhexdiisa laga laga helaa labo aayadood: halkan iyo Luukos 24:39. Luukos dhexdiisa waa dhacdadii waa sarakicista dabadeed, waxaana loo badanayaa in Yooxanaa uu isla sidan oo kale ugu adeegsanayo.

▣ **“Hadalka nolosha”** ujeedada adeegsiga erayga *logos* waxa uu halkan ku tusinayaa soo jiidashada hammiga macallimiintii Giriigga ee beenta ahayd, sida ku sugan Yooxanaa Injiilkiisa oo kale (1:1). Eraygan waxa in badan lagu dhex adeegsaday falsafaddii Giriigga, waxaanay leedahay asal gaara ku leedahay Cibraaniga (Hordhaca Yooxanaa 1, C). halkanna waxay ku tusinaysaa Injiilka iyo shakhsiyadda Injiilka.

1:2 aayaddani waxa ay dhinac ka tahay qeexitaanka “nolol.”

▣ **“nolosha”** “*Zōē*” (aayadda labaad, labo jeer) waxa uu Yooxanaa si joogto ah ugu adeegsanayaa nolosha ruuxiga ah, nolosha sarakicista, nolosha casriga cusub, ama nolosha Ilaah (Yooxanaa 1:4; 3:15, 36[labo jeer]; 4:14, 36; 5:24[labo jeer], 26 [labo jeer], 29, 39, 40; 6:27, 33, 35, 40, 47, 48, 51, 53, 54, 63, 68; 8:12; 10:10, 28; 11:25; 12:25, 50; 14:6; 17:2, 3; 20:31; 1 Yooxanaa 1:1, 2; 2:25; 3:14-15; 5:11, 12, 13, 16, 20). Ciise ayaa naftiisa ugu yeedhay “Nolosha” (Yooxanaa 14:6).

▣ **“muujiyey,”** falka waxa la adeegsaday labo jeer. Hadiyo goor falka ku dhisan qarsoodiga ayaa loo adeegsadayaa shaqada Aabbaha. Eraygan (*phaneroō*) waxa macnihiisu yaay “keenitaankii iftiinkii hore u joogay.” Waxa hadalka sidana jeclaa Yooxanaa (Yooxanaa 1:31; 3:21; 9:3; 12:6; 1 Yooxanaa 1:2 [labo jeer]; 2:19; 3:5, 8, 10; 4:9). Falkan tegay waxa uu muujinayaa xaqiiqada jidh soo qaadashada (Yooxanaa 1:14), kaasi oo macallimiinta beenta ahi diideen.

▣ **“u marag furaynaa”** Waxa uu Yooxanaa tilmaamayaa khibraddiisa shakhsi ahaaneed, badanaana hadalladan waxa lagu adeegsadaa maxkamadaha. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 1:8.

▣ **“warramaynaa”** waxa ay tilmaysaa markhaati furka Yooxanaa ee awoodda leh isla markaana lagu muujiyay ee lagu diiwaan geliyay waadin iyo qoraal. Kani waa falka ugu muhiimsan ee aayadaha 1-3, waxaana lagu soo celiyay labo jeer (aayadda 2 iyo 3).

▣ **“Aabbaha la jirtay”** sida aayadda 1 oo kale, ayaa ay tani tilmaamaysaa jiritaanka hore ee Ciise. Waxa ay erayadu la mid yihiin sida Yooxanaa 1:1. Ilaanimadu waxa ay soo qaadatay jidh bani aadan (Yooxanaa 1:14). Ciise oo la gartaa waxay ka dhigantahay Ilaah oo la gartay (Yooxanaa 14:8-11), waxaanay tani tusaale u tahay qaabka labonimada ah ee Yooxanaa adeegsanayo.

1:3 **“Wixii aannu aragnay oo aannu maqalnay ayaannu idiinka warramaynaa”** waxa ay soo celinaysaa erayada ku sugan aayadda 1 iyadoo ka daba imanaysa diidmada ka gees noqoshada ku sugan aayadda 2. Waxa ay kusoo celinaysaa falalka ka muuqanaya aayadda 1.

▣ **“sidoo kale idiinka warramaynaa”** waa falka aasaaska u ah aayadaha 1-3, waana fal jooga oo tumsamayn wada. In Ilaah la gartaana waxay u baahantay iyadoo lala joogo carruurtiisa!

▣ **“si aad idinkuna noo soo wehelisaan”** waa erayada (*hina*) oo uu la socdo fal jooga oo garasho ku dhisan. Ujeedada Injiilku waxay ahayd in kuwa aan arag ama maqal Ciise ay noqdaan kuwo ku badbaada markhaatifurka Rasuullada (Yooxanaa 17:20; 20:29-31). Waa is weheshiga ku ahaaday nimcada keenaysa “farxad,” “nabad,” iyo “damaanad qaad”! kaniisaddu waa bulsho ka kooban rumaystayaal, jidh rumaystayaal! Injiilkuna wuxuu u ahaaday dhammaanba dunida.

MAWDUUC GAAR AH: KOINONIA

Ereyga “is weheshi” (*koinōnia*) wuxuu la macne yahay

1. Xidhiidh dhow oo cid lala yeesho
 - a. Lala yeesho Wiilka (cf. I Yooxanaa 1:6; I Korintos 1:9).
 - b. Lala Ruuxa yeesho (cf. II Korintos 13:13; Filiboy 2:1).
 - c. Lala yeesho Aabbaha iyo Wiilka (cf. I Yooxanaa 1-3).
 - d. Lala yeesho walaalaha kale ee Axdiga (cf. I Yooxanaa 1:7; Galatiya 2: 9; Felimon 17).
2. Xidhiidh dhow oo lala yeesho shay ama koox
 - a. Lala yeesho Injiilka (cf. Filiboy 1:5; Felimon 6).
 - b. Lala yeesho dhiigga Masiixa (cf. I Korintos 10:16).
 - c. Aan lala yeelan gudcurka (cf. II Korintos 6:14).
 - d. Lala yeesho silicii (cf. Filiboy 3:10; 4:14; I Butros 4:13)
3. Hadiyad ama caawin si naxariisa loo sameeyo (cf. Rooma 12:13; 15:26; II Korintos 8:4; 9:13; Filiboy 4:15; Cibraaniyada 13:16)
4. Ilaah hadiyaddiisa soo marta Masiixa, taasoo dib u soo celisa Isaga iyo walaalihiis wiilal iyo gabdhoba.

Tani waxa ay caddaynaysaa xidhiidhka qumaatiga ah (ka aadane ku aadane) oo uu ku imanayo xidhiidhka jiiiftada ah (ka aadane Ku Abuuraha). Tani waxa ay qeexaysaa baahida loo qabo iyo farxadda bulshada Masiixiyiinta ah. Ereyga falka waqtiga jooga ah waxa uu xoojinayaa biliowga iyo sii socoshada waayo aragnimadan bulshadatan (cf. 1:3 [mar labaad],6,7). Masiixiyaddu waa iskaashi!

MAWDUUC GAAR AH: MASIIXIYADDU WAA ISKAASHI

- A. Rasuul Bawlos wuxuu adeegsanayaa sawiro dhowra oo uu ku tilmaamayo nolosha Masiixiyadda:
 1. Jidh
 2. Beer
 3. Dhisme
- B. Erayaga “quduusiin” hadiyo goor waa jamac (marka laga reebo 4:21, laakiin sidoo kale iyana arrintan ayay ka hadlaysaa)
- C. Fahanka “wadaadnimada rumaystuhu” ee Martin Luther maaha kitaabi, laakiinse waa wadaadnimada rumaystayaasha (Baxniintii 19:6; 1 Butros 2:5,9; Muujintii 1:6).
- D. Rumayste kastaa waxa uu dhinac ugu wanaagsan yahay rumaystayaasha oo dhan (1 Korintos 12:7).
- E. Iskaashiga ayaa dadka Ilaah ku noqon karaan kuwo saamayn yeesha, adeegguna waa arrin jamaaci ah.

▣ **“la jirta Aabbaha iyo Wiilkiisa”** waa laba hadal oo siman xagga naxwe ahaan, waxaanu adkaynayaa macnaha luqo ahaaneed Ciise Ilaahnimadiisa (5:18; 10:33; 19:7). Waxa suurto gal aan ahayn ni Aabbaha la helo Wiilka la’aantiisa, sida ay sheegteen macallimiinta beenta ahi (1 Yooxanaa 2:23; 5:10-12). Shuraakanimada Aabbaha iyo Wiilku waxa ay u egtahay qaybta ka hadlaysay Aabbaha iyo Wiilka oo ku dhex jira rumaystaha (Yooxanaa 14:23).

1:4 “waxaannu waxyaalahan idiinku soo qoraynaa” Tani waxa ay tilmaami kartaa kitaabka oo dhan ama gaar ahaan aayadaha 1-3. Sidan oo kalena waxa laga arki karaa 2:1. Qoraagu halkan waxa uu ku sheegayaa u jeedada waraaqda uu u qorayo (2:1).

▣ **“si ay farxaddiinnu u buuxsanto”** waa fal dhammays tiran oo ku dhisan garasho la’aan (Yooxanaa 15:11; 16:20, 22, 24; 17:13; 2 Yooxanaa 12; 3 Yooxanaa 4). Farxadda muminiintu waxa ay ku dhammays tirmaysaa la joogista Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Quduuska ah, tanina waxa ay muhiim u tahay ka hortegista macallimiinta beenta ah. Yooxanaa waxa uu sheegayaa ujeedada qorista kitaabkan oo ah:

1. Weheshiga Ilaah iyo carruurtiisa
2. Farxad
3. Yaqiinsasho
4. Dhinaca diidamada waa in rumaystayaasha iska ilaaliyaan fiqiga iyo macallimiinta beenta ah.

Waxa jira kala duwanaansho qoraallada Giriigga oo u dhexeeya

1. “Farxaddayada,” MSS x, B, L; NASB, NRSV, NJB, REB, NIV

2. “Farxaddiina” MSS A, C; NKJV

UBS⁴ ku waxa uu qaadanayaa #1. Miyay “anagu” tilmaamaysaa Rasuullada markhaati furkooda ama rumaystayaasha? Marka la eego fiqiga I Yooxanaa tani waxa ay sheegaysaa rumaystayaasha oo dhan.

NASB (UPDATED) TEXT: 1:5-2:2

⁵Warkii aannu ka maqalnay oo aan idiinka warramayno wuxuu yahay, in Ilaah nuur yahay, oo isaga aan gudcur ku jirin innaba. ⁶Haddaynu nidhaahno, Wehelnimo ayaynu la wadaagnaa isaga, oo aynu gudcurka ku soconno, been baynu sheegnaa, oo runta ma falno. ⁷Laakiin haddaynu nuurka ku soconno siduu isaguba nuurka ugu jiro, wehelnimo ayaynu isla wada wadaagnaa, oo dhiigga Ciise, oo Wiilkiisa ah, wuxuu inaga nadiifiyaa dembi oo dhan. ⁸Haddaynu nidhaahno, Dembi ma lihin, nafsaddeenna ayaynu khiyaanaynaa, oo runtuna inaguma jirto. ⁹Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu waa aamin iyo caadil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan. ¹⁰Haddaynu nidhaahno, Ma aynu dembaabin, waxaynu Ilaah ka dhignaa beenaaleh, oo hadalkiisu inaguma jiro. Carruurtaydiyey, waxaan waxyaalahan idiinku soo qorayaa si aydnaan u dembaabin; oo qof uun hadduu dembaabo, waxaynu xagga Aabbaha ku leennahay Dhexdhexaadiye, waana Ciise Masiix kan xaq ah. ²Oo isaguna wuxuu dembiyadeenna u yahay kafaarogudka; oo kuweenna oo keliya uma aha ee weliba wuxuu u yahay dembiyada dunida oo dhan.

1:5 “Warkii aannu ka maqalnay” qaabka jamaca ahi waxa uu tilmaamayaa Yooxanaa iyo markhaatifurayaashii kale ee raacay Ciise markii uu dhulka ka adeegaysay. Waxa uu Yooxanaa la hadlayaa akhristayaashiisa sida ku sugan 2:1, waxaana laga yaabaa inuu tilmaamayay kaniisadihii Aasiyada Yar.

Falka dhammayska tiran ee ku dhisan garashadu waxa uu tilmaamayaa dareenka jidh ahaaneed 1:1-4. Waxa uu Yooxanaa sheegayaa inuu si shakhsi ahaana u arkay waxbaristii Ciise, waxaanu hadalkaas u daliishanayaa waxbaristiisa.

▣ **“Isaga”** waa magac u yaalka keliya ee ku sugan 1:5-2:2 isaga oo sheegaya Ciise oo u yimid inuu muujiyo Aabbaha (Yooxanaa 1:18). Fiqi ahaan Ciise waxa uu u yimid saddexdan u jeedo:

1. Inuu muujiyo Aabbaha (1:5)
2. Inuu rumaystayaasha siiyo tusaale ay raacaan (1:7)
3. Inuu u dhinto denbiyada aadanaha (1:7; 2:2)

▣ **“in Ilaah nuur yahay”** hadalkani waxa uu adkaynayaa muujinta iyo quduusnaanta dabeecadda Ilaah (Sabuurka 27:1; Ishacyaah 60:20; Miikaah 7:8; 1 Timoteyos 6:16; Yacquub 1:17). Gonostigu waxa ay sheegayeen in iftiinku uu tilmaamaya garashada, laakiin Yooxanaa waxa uu sheegayaa saafinnimada akhlaaqeed. Erayada “nuur” iyo “mugdi” ayaa marar badan kusoo arooraya qoraallada laga helay Badda Dhimatay, waxaanay sheegayaan joogitaanka sharka iyo khayrka (Yooxanaa 1:5; 8:12; 12:46), iyo sidoo kale laga yaabaa waxa u dhexeeya maaddada iyo ruuxa sida Gonostigu rумыasnaayeen. Taninana waa tusaale fudud oo tilmaamayaa sidii Yooxanaa u tilmaami jiray Ilaahnimada. Waxa kaloo jira inuu adeegsanayo (1) “Jacaylka Ilaah” (4:8, 16) iyo (2) “Ilaah waa Ruux” (Yooxanaa 4:24). Qoyska Ilaah, waa sida Ciise oo kale (Yooxanaa 8:12; 9:5), waana inay muujiyaan shakhsiyadda Ilaah (Matayos 5:14). Nololaha oo isu bedesha jacayl iyo denbi dhaafna iyo quduusnaana waxa ay tahay mid tusaale u ah rumaysashada runta ah.

▣ **“oo isaga aan gudcur ku jirin innaba”** waa diidmo laban laab ah iyada oo la adkaynayo dabeecadda Ilaah ee quduuska ah isla markaana aan is bedbedelin (1 Timoteyos 6:16; Yacquub 1:17; Sabuurka 102:27; Malaakii 3:6).

1:6 “Haddaynu nidhaahno” waa jumlad shuruudeedda ugu horraysa ee heerka saddexaad ah isla markaasna tilmaamaysa, sheegashooyinka beenta ah ee macallimiinta beenta ah (1:8, 10; 2:4, 6, 9). Hadalladani waxa weeyi waxyaalaha aan ka haysano caqiidooyinka macallimiinta beenta ah ee Gonostiga, waxaanay ahayd Gonostigii koobaad.

Waxa aan qoraalka ka arki karnaa qaab suugaaneedka ku tiirsan doodda, waana sida aan ka arki karno Malaakii (1:2, 6, 7, 12; 2:14, 17; 3:7, 14) iyo Rooma (2:3, 17, 21-23; 3:1, 3, 7, 7-8, 9, 31; 4:1; 6:1; 7:7).

▣ **“Wehelnimo ayaynu la wadaagnaa isaga,”** bidcoolayaasha ayaa waxa ay sheegteen in wehel layeelashadu ay ku dhisan tahay garashada oo keliya, waxaanay arrintani ahayd mid lagu yaqaanay falsafaddii Giriigga ilaa wakhtigii Plato. Haddaba, Yooxanaa waxa uu xoojinayaa in rumaystayaashu ay u noolaadaan sidii Ciise oo kale (aayadda 7; Laawiyiintii 19:2; 20:7; Matayos 5:48). Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3.

▣ **“oo aynu gudcurka ku soconno,”** waa fal jooga oo garasho ku dhisan. U ekaysiintan qoraal ahaaneed waxa ay tusinaysaa qaabka nolosha ku dhisan akhlaaqda (Efesos 4:1, 17; 5:2, 15). Ilaah waa nuur oo mugdina kuma jiro isaga, sidoo kalena carruurtiisu waa in ay isaga ku daydaan (Matayos 5:48).

▣ **“been baynu sheegnaa, oo runta ma falno.”** Waa labo fal oo taagan wakhti xaadirka. Yooxanaa waxa uu u yeedhayaa dhowr nooc oo ah dadka diinta beenta haysta (1:10; 2:4, 20; 4:20; Ishacyaah 29:13). Qaab nololeedku waxa uu muujiya waxa ku jira qalbiga (Matayos 7). Eeg Mawduuca Gaarka ah: 6:55.

1:7 “laakiin haddaynu nuurka ku soconno” waa fal wakhti xaadirka jooga oo adkaynaya sii socosho. Falka ah “socod” waa tusaale ku sugan Axdiga Cusub oo loo adeegsado nolosha Masiixinimada (Efesos 4:1, 17; 5:2, 15).

U fiirso isku xidhaanshaha ka dhexeeya “socod” iyo nolosha Masiixiga. Runta ayaa waxa ay tahya in lagu noolaado laakiinse maaha in la garto oo keliya! Runtuna waa waxa furaha u ah qoraallada Yooxanaa. Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55 iyo 17:3.

▣ **“siduu isaguba nuurka ugu jiro”** rumaystayaasha waxa laga rabaa inay u noolaadaan sida Ilaah oo kale (Matayos 5:48). Waa in dabeecaddiisa ay u muujiyaan dunida lunsan, badbaadaduna waa dib usoo celinta muuqaalka Ilaah ee ku jira aadanaha (Muujintii 1:26, 27), ee ku dhaawacmay leexashadii Bilowgii 3.

▣ **“wehelnimo ayaynu isla wada wadaagnaa”** erayga ah “wadaag” Giriigga waxay ku tahay *koinōnia*, waxaana weeyi labo qof oo wax wada wadaaga (eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3). Masiixiyaddu waxa ay ku dhisantahay rumaystayaasha oo wadaaga nolosha Ciise, haddii aan noloshiisa aqbalnana, waa inaan adeeggiisa ku aqbalno dhinaca jacaylka (1 Yooxanaa 3:16). Ilaah oo la gartaa maaha run keligeed meel taalla, laakiinse waxa ka dhalanaya wehelnimo iyo nolol saafi ah, sidoo kalena ujeedada Masiixiyaddu maaha in janno lagu helo, laakiin waa u ekaanshanimada Masiixa ee hadda. Gonostigu waxa ay u janjeedheen xagga kala sarraynta, laakiinse Masiixiyaddu, waxa weeyi xidhiidh sax ah oo lagula dhaqmo Ilaah iyo rumaystayaasha kale. Yaraanshaha jacaylka rumaystayaasha kale waxa uu calaamad u yahay mushkilad ah dhinaca xidhiidhka Ilaah (4:20-21 iyo Matayos 5:7; 6:14-15; 18:21-35).

▣ **“dhiigga Ciise,”** waxa ay tilmaamaysaa dhiigga madaxfurashada ah ee Ciise (Ishacyaah 52:13-53:12; Markos 10:45; 2 Korintos 5:21), waxaanay aad uugu eegtahay 2:2, “kafaara gudka denbiyadeenna.” Tani waa middii uu sheegay Yooxanaa Baabtiisuhu: “eega wanka Ilaah ee qaadi doona denbiga dunida” (Yooxanaa 1:29). Kii berida ahaa ayaana u dhintay denbiilayaasha!

Gonostigii hore waxa ay diidanayeen aadananimada Ciise, sidaasi darteedna Yooxanaa “dhiig” waxa uu ku tusinayaa aadananimada Ciise.

Waxa jira kala duwanaansho qoraal gacmeedyada Giriigga ah oo la xidhiidha magaca

1. Ciise – NASB, NRSV, NJB, REB, NET
2. Masiix – MSS a, B, C
3. Ciise Masiix – NKJV

▣ Kani waa tusaale uu adeegsaday Bart D. Ehrman, *The Orthodox Corruption of Scripture*, p. 153, si uu u tusiyo, sidii ay culimadii hore isugu dayeen inay qoraalka caddayntiisa gaarka ah. ikhtiyaarka #3 ayaa waxa uu isku dayay inuu dhexdhexaadiyo farqiga u dhexeeya MSS ka.

▣ **“inaga nadiifiyaa dembi oo dhan”** waa fal wakhti xaadirka jooga oo ku dhisan garasho tusmayna wada. Maqnaanshaha garashada erayga “denbi” waxa uu tusinayaa in loogala jeedo dhammaanba denbiyada. U fiirso iyada oo aayaddani aan diiradda saarayn nadiifin wakhti keliya ah (badbaadada, aayadda 7), laakiin waxay

tusinaysaa nadiifin soconaysaa (nolsha Masiixiga, aayadda 9). Labadubana waxa ay ka qayb yihiin khibradda Masiixiga (Yooxanaa 13:10).

1:18 “Haddaynu nidhaahno, Dembi ma lihin” waa weedh shuruudeed kale oo heerka saddexaad ah. Denbigu waa xaqiiqo ruuxi ah oo ku dhex sugnaaday dunida leexatay, xitaa rumaystayaasha (Rooma 7), waana arrinta uu Yooxanaa marar dhowra ka hadlayo (9:41; 15:22, 24; 19:11). Aayaddani waxa ay diidaysaa dhammaanba sheegashooyinkii hore iyo kuwan casriga ah ee ka tegitaanka masuuliyadda akhlaaq ahaaneed.

▣ **“nafsaddeenna ayaynu khiyaanaynaa”** erayada Giriigga ahi waxa ay tusinayaan diidmo doonis ah oo shakhsi ahaaneed, mana aha jaahilnimo oo keliya.

▣ **“oo runtuna inaguma jirto”** Ilaaha Quduuska ahi inaguma aqbalayo denbiyadeenna oon dafirno, laakiin waa inaan qirano, aqbalitaankeenuna waa middii ku timid Masiixa (Rooma 3:21-31). “Runtuna” waxa ay tilmaami kartaa farriinta ama shakhsiyadda Ciise (Yooxanaa 14:6). Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55 iyo 17:3.

1:8, 9 “haddii” waa labo weedh shuruudood oo heerka saddexaad ah iyagoo tusinaya suurta galnimada xaqiijinta.

1:9 “qiranno” waa erayo Giriigga ka kooban labo eray “hadlo” iyo “la mida.” Rumaystayaashu waxa ay waafaqayaan in ay Ilaah quduusnimadiisa kasoo horjeesteen (Rooma 3:23). Falkuna waa fal wakhti xaadirka jooga oo faa’idaynaya kusii socosho. Qirashadu waxay koobsanaysaa:

1. Magacaabista denbiyada (aayadda 9)

2. Qirashada denbiga ee muuqata (Matayos 10:32; Yacquub 5:16)

3. Ka towbad keenitaanka denbiyada (Matayos 3:6; Markos 1:5; Falimaha Rasuullada 19:18; Yacquub 5:16)

Badanaa Yooxanaa ereygan ayuu ku adeegsanayaa waraaqdiisa koobaad (1:9; 4:2, 3, 15; 2 Yooxanaa 7). Dhimashada Ciise waxa ay ahayd badbaadada iyo denbi dhaafku qaabkuu ku imanayay, laakiin aadanaha denbiilayaasha ah waxa laga rabaa inay ka jawaaba celiyaan, oo ka jawaab celintana ay kusii socdaan iyagoo rumaysad kusii soconaya (Yooxanaa 1:12; 3:16). Eeg Mawduuca Gaarka ah 9:22-23.

▣ **“dembiyadeenna”** u fiirso qaabka jamaca oo tilmaamya dembiyo gaar ah.

▣ **“isagu waa aamin”** halkan waxa lagu tilmaamayaa Aabbaha (Sharciga Kunoqoshadiisa 7:9; 32:4; Sabuurka 36:5; 40:10; 89:1, 2, 5, 8; 92:2; 119:90; Ishacyaah 49:7; Rooma 3:3; 1 Korintos 1:9; 10:13; 2 Korintos 1:18; 1 Tesaloniika 5:24; 2 Timoteyos 2:13). Runtu waa rajadeenna sugan! Aayaddanina waxa ay adkaynaysaa Ilaah oo eraygiisa aamin u ah (Cibraaniyada 10:23; 11:11). Sidoo kale waxa laga yaabaa inay sheegayso Axdiga Ilaah ee cusub ballan qaadkiisa lagu sameeyay Yeremyaah 31:34, kaasi oo lagu ballan qaaday cafiska denbiyada.

▣ **“iyo caadil”** waxay u muuqataa inaanu hadalkani meeshiisii oollin, maxaa yeelay waxa lagasoo hadlayay Ilaaha quduuska ah ee debiyada dhaafa, laakiin waa iska caadi dhinaca fiqi ahaan, waayo Ilaah denbiyadeenna waxa uu ku dhaafay dhimashada Masiixa (Rooma 3:21-31). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:29.

▣ **“cafiyo...nadiifiyo”** waa labo fal oo ah wakhti tegay, waxaanay tilmaamayaan badbaadada kuwo lumay iyo nadiifinta sii soconaysa, isla markaana lagama maarmaanka u ah weheshiga Ilaah (Ishacyaah 1:18; 38:17; 43:25; 44:22; Sabuurka 103:3, 11-13; Miikaah 7:19). Macallimiintii beenta ahaa ee dafiray Injiilkku waxay u baahnaayeen badbaadada. Rumaystayaasha denbiga galayaana waay u baahan yihiin dib usoo celinta weheshiga Ilaah. waxay u muuqataa inuu Yooxanaa kooxda hore ugu horrayn la hadlayo, isagoo kaddibna kusoo daraya kuwa kale.

1:10 “Haddaynu nidhaahno” eeg fiirada 1:6.

▣ **“Ma aynu dembaabin”** falka buuxa ee ku dhisan garashadu, waxa uu tusinayaa qof aan denbaabin wakhtigii tegay iyo kan jooga toona, falkuna guud ahaan waxa uu tilmaamayaa denbiga. Erayada Giriigga ah ee “ka leexashada ujeedadu” waxa loogala jeedaa in denbigu yahay waxa kasoo horjeeda waxbarista erayga Ilaah, ha ahaato ficil ama ka dheeraansho. Macallimiinta beenta ah ayaa sheegtay in badbaadada lagu helayo garashada oon nolol lagu helayn.

▣ **“waxaynu Ilaah ka dhignaa beenaaleh”** Injiilku waxa uu ku salaysan yahay in dhammaanba aadanuhu denbaabeen (Rooma 3:9-18, 23; 5:1; 11:32), haddii arrintu aanay sidaan ahayna Ilaah ayaa been sheegaya ayay ka dhigan tahay (Rooma 3:4) ama kuwa dhowrsanaanta sheeganaya ayaa been sheegaya.

▣ **“oo hadalkiisu inaguma jiro”** waxa ay koobsanaysaa ereyga *“logos,”* iyada oo fariin iyo shakhsi isugu jirta (1:1, 8; Yooxanaa 14:6). Yooxanaa badanaa tan waxa uu ku sheegayaa *“runta.”*

2:1 “Carruurtaydiyey” Yooxanaa laba eray ayuu waraaqaddiisa koobaad ugu adeegsanayaa isaga oo tilmaamaya *“carruur.”*

1. *Teknion* (2:1, 12, 28; 3:7, 18; 4:4; Yooxanaa 13:33)

2. *Paidion* (2:14, 18)

Waa isku macno labaduba iyaga oo fiqi ahaan waxba la xidhiidhin, waxaana laga yaabaa in markii da’diisu waynayd uu la hadlayay dad da’yar ah markuu waraaqdan qoryay.

Ciise wuxuu *“carruur”* adeegsaday isagoo la hadlayay xertiisii sida ku sugan Yooxanaa 13:33.

▣ **“waxaan waxyaalahan idiinku soo qorayaa si aydaan u dembaabin”** waa fal tegay oo ku dhisan garasho. Yooxanaa waxa uu kala soocayaa falka wakhtigaas jooga, ee ah kusii socoshada denbiga caado ahaan (3:6, 9), iyo gelitaanka denbiga gaarka ah ee Masiixiyiinta, waxaanu isku dayayaa isu dheelli tirista labo waxyaalood oo xagjir ah:

1. Dhayalsiga denbiga (Rooma 6:1; 1 Yooxanaa 1:8-10; 3:6-9; 5:16)

2. Adayga xoogga badan ee ku waajahan Masiixiyiinta denbiyadoo shakhsi ahaaneed

Sidii aan hore u soo sheegnay labadan waxyaalood waxa ay ka tarjumayaan fahankii Gonostiga, halkaasoo qolo ay badbaadada u aaminsanayd arrin caqliga ah, sidaasi darteedna waxa aan muhiim ahayn in qofku uu ku noolaado akhlaaq maadaama oo jidhku uu yahay shar, halka qolada kalena ka aaminsanayd maadaama oo jidhku shar yahay inuu ku noolaado doonistiisa oo dhan.

▣ **“oo qof uun hadduu dembaabo”** waa weedh shuruudeed heerka saddexaad ah, iyadoo faa’idaynasa wax suurto gali kara . dhammaan waa la wada denbaabaa xitaa Masiixiyiinta (Rooma 7).

▣ **“waxaynu xagga Aabbaha ku leennahay Dhexdhexaadiye”** waa fal wakhti xaadirka jooga oo ku dhisan garasho, waxaanu tusinayaa sii socoshada shafeecay qaadista Ciise (*parakletos*). Asalka erayguna waxa uu tusinayaa maxkamadayn iyadoo loogala jeedo caawimada qofka eedaynaha ah (*para* oo ah dhinac, *kaleo* yeedhis). Yooxanaa waxa uu eraygan u adeegsanayaa isaga oo ku tilmaamaya Ruuxa Quduuska ah (Yooxanaa 14:16, 25; 15:26; 16:7). Halkana waa adeegsiga keliya ee lagu tilmaamay Ciise (inkasta oo lagu sheegay Yooxanaa 14:16; Rooma 8:34; Cibraaniyada 4:14-16; 7:25; 9:24). Rasuul Bawlos ayaa isna fahankan u adeegsanaya isaga oo sifaynaya shaqada Ciise ee shafeecay qaadista ah sida ku sugan Rooma 8:34, isagoo sidoo kalena ka hadlaya shafaaca qaadista Ruuxa Quduuska ah ee isla Rooma 8:26. Waxa aan leennahay dhexdhexaadiye ku sugan samada (Ciise) iyo dhexdhexaadiye ku sugan dhulka (Ruuxa), waxaana inoo soo diray Aabbaha.

▣ **“Ciise Masiix kan xaqa ah.”** sifadan waxa Aabbaha loogu adeegsaday 1:9. Qorayaasha Axdiga Cusubina waxa ay adeegsanayaan qaab suugaaneed ay ku adkaynayaan Ilaahnimada Ciise.

1. Adeegsiga mid ka mida magacyada Ilaah

2. Shuqullada Ilaah oo uu qabtay Ciise

3. Adeegsiga qaab naxwe oo koobsanaya simitaanka tilmaamista Aabbaha iyo Wiilka

Waxa ay erayadani tilmaamayaa quduusnaanta Ciise ee la midka ah quduusnaanta Aabbaha (3:5; 2 Korintos 5:21; Cibraaniyada 2:18; 4:15; 7:26; 1 Butros 2:22). Ciisena waxa uu ahaa jidka Ilaah uu dadka ugu keenay xaqnimada.

2:2

NASB, NKJV

NRSV

TEV

NJB, RSV

“isaguna wuxuu dembiyadeenna u yahay kafaarogudka”

“isagu waa kafaara gudka denbiyadeenna”

“Masiixa laftiisu waxa weeyi ka lagu cafiyay denbiyadeenna”

“Isagu waa ka loo sadaqeeyay denbiyadeenna aawadood”

Erayga *hilasmos* waxa Sebtuujiinta looga adeegsaday dedista Sanduuqa Axdiga ee lagu magacaabay kursiga naxariista ama meesha kafaara gudka. Ciise waxa uu naftiisa dhigay meeshii denbiyadeenna (4:10; Rooma 3:25).

Eraygani waxa uu ka xanbaarsanaa dunidii Giriig-Roomaanka fahanka ah soo ceshiga weheshiga ilaahyada iyada oo la dhiibayo lacag, laakiinse maaha macnaha kusoo arooray Sebtuujiinta (xasuuso qorayaasha Axdiga Cusub [marka laga reebo Luukos] waxay ahaayeen Yuhuud wax ku qoraysay luqadii Giriigga). Waxa lagu adeegsaday Sebtuujiinta iyo Cibraaniyada 9:5 isaga oo u tarjumaya “kursiga naxariista,” kaasi oo lagu dedi jiray Sanduuqa Axdiga iyadoo la dhigayo meesha ugu quduusaysan, waana meeshii Maalinta Kafaarogudka loogu gudbin jiray ummadda oo dhan (Laawiyiintii 16).

Eraygan waxa loo adeegsaday qaab aan yaraynayn cadhada Ilaah, laakiinse adkaynaya halka uu ka taagan yahay madax furashada denbiga. James Stewart ayaa si fiican ugaga hadlaya kitaabkiisa *A Man in Christ*, pp. 214-224. Mid ka mida jidka arrintani ku dhaboobayso ayaa ah in la adeegsado tarjumaadda ku haboon, taasi oo ka tarjumaysa shaqada Ilaah ku dhex qabtay Masiixa: “madax furasho” ama “awoodda madaxfurashada.”

Tarjumaadaha Ingiriisida ayaa middan ku kala duwan, laakiin erayga ah “kafaarogud” ayaa koobsanaya, in Ciise uu dusha saartay cadhadii Ilaah (Rooma 1:18; 5:9; Efesos 5:6; Kolosay 3:6). Denbiga aadanuhu waxa uu lidi ku noqday quduusnaanta Ilaah, sidaasi darteedna Ciise waxay ahayd inuu sameeyo kafaaro gudka (Rooma 3:25; 2 Korintos 5:21; Cibraaniyada 2:17).

Kuwo ka mida culimada (C. H. Dodd) ayaa rumaysan in fahan Giriig ah oo khuseeya sanamyada (raalli gelinta cadhada ilaahyada), aan lagu sheegin Ilaah oo kale, sidaasi darteedna Ciise ayaa adeegitaankiisa kafaaro gud ugu noqday denbiyada dadka (Yooxanaa 1:29; 3:16), arrinta khusaysa cadhada Ilaahna maaha mid kasoo horjeedda denbiga. Labada rayibana dhinaca kitaabka marka laga eego waa sax.

▣ **“oo kuweenna oo keliya uma aha ee weliba wuxuu u yahay dembiyada dunida oo dhan”** aayaddani waxa ay tilmaamaysaa kafaara gudka ku yimid Ciise maaha mid xadidan (4:14; Yooxanaa 1:29; 3:16, 17; 12:47; Rooma 5:18; 1 Timoteyos 4:10; Tiitos 2:11; Cibraaniyada 2:9; 7:25). Ciise waxa uu u dhintay denbiga iyo denbiyada dunida oo dhan (Bilowgii 3:15), laakiinse aadanuhu waa in ay ka jawaab celiyaan, oo jawaab celintana ay kusii wadaan rumaysad, towbad keen, iyo addeecitaan!

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu Yooxanaa u adeegsanayaa waxyaalaha badan ee la xidhiidha dareemaha shanta ah?
2. Tiri hadallada la xidhiidha madax furashada sida ku sugan aayadaha 7 iyo 9.
3. Sharraxaad ka bixi caqiidooyinkii bidcoolayaasha ee Yooxanaa uu waajahayay?
4. Aayadda 9 siday uula hadlaysaa Gonostiga iyo rumaystayaasha?
5. Sifee oo xadid macnaha “qirashada.”

1 YOOXANAA 2:3-27

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ^d	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Masiixu waa shafeeca qaadeheenna	Aasaaska weheshi la yeelashadiisa (1:5-2:2)	Adeecitaanka	Masiixu waa qareenkeena	Ku socoshada nuurka (1:5-2:28)
2:1-6		2:1-2	2:1-2	Ugu horrayn denbiga waa in laga gp'o (1:8-2:3)
Qaynuunka cusub	Tijaabinta garashadiisa			Marka labaad waa in la dhowro qaynuunnada, gaar ahaan ka jacaylka
2:7-14	2:3-11	2:3-6	2:3-6	2:3-11
		Is jeclaanshaha	Amarka cusub	
		2:7-11	2:7-8	
			2:9-11	
	Xaaladdooda ruux ahaaneed	Xidhiidhka runta ah ee Masiixa lagula yeelanayo Ilaah		Marka saddexaad: kasoocnaanta dunida
	2:12-14	2:12-14	2:12-13	2:12-17
			2:14	
	Ha jeclaacnina dunida	Qiimaynta runta ah ee dunida		2:18-28
2:15-17	2:15-17	2:15-17	2:15-17	
Kasoo horjeesashada Masiixa	Addeecis darrada saacadda danbe	Addeecista rumaysadka runta ah	Cadowga Masiixa	
2:18-25	2:18-23	2:18-25	2:18-19	
			2:20-21	
			2:22-23	
	2:24-25		2:24-25	
2:26-27		2:26-27	2:26-27	

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEADADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 2:3-27

- A. Waxa adag in mawduucyo loo kala jarjaro kitaabkan maxaa yeelay waxa soo noqononaya mawduucyadiisa, laakiin mufasiriinta badankooda ayaa isku waafaqsan, in cutubka labaad uu raacsan yahay mawduucyadii cutubka hore ee weheshiga Ilaah.
- B. Waxa jira isu dheelli tir ah cutubka koobaad iyo ka labaad, isaga oo Yooxanaa warqaddiisu ay kasoo horjeeddo waxbaristii Gonostiga ee beenta ahayd.

Cutubka 1

1. Haddaan nidhaano.. (aayadaha 6-7)
2. Haddaan nidhaahno .. (aayadaha 8-9)
3. Haddaan nidhaano.. (aayadda 10)

Cutubka 2

1. Kan yidhaahda .. (aayadaha 4-5)
2. Kan yidhaahda .. (aayadda 6)
3. Kan yidhaahda.. (aayadaha 8-11)

- C. Qaybtani waxa ay tirinaysaa caddaymaha ama imtixaanka muujinaya rumaystaha runta ah (2:3-5).

1. Doonista qirashada denbiga (1:5; 2:22)
2. Nollosha addeecitaanka ku dhisan (2:3-6)
3. Nollosha ku dhisan jacaylka (2:7-11)
4. Ka guulaysashada sharka (2:12-14)
5. Ka jeedshada dunida (2:15-17)
6. Ku socoshada rumaysadka (2:19)
7. Caqiidada saxda ah (2:20-24; 4:1-3)

- D. Fahan fiqi ahaaneed oo gaar ah (2:18-19).

1. “saacadda ugu danbaysa” (aayadda 18)

a. Erayadani waxay u eegyihin “maalmaha ugu danbeeya” taasi oo tusinaysa wakhtiga u dhexeeya jidh soo qaadashadii Masiixa, iyo imaantinkiisa labaad. Boqortooyada way timid laakiin weli may dhammays tirmin.

b. Rumaystayaashii Axdiga Hore waxay aaminsanaayeen labo casri oo kala ahaa casriga sharka iyo casriga wanaagsan ee Ruuxu uu bilaabi doono mustaqbalka. Waxa aanu si fiican Axdiga Hore si fiican uga hadlin waxa jira Masiixa oo ugu horrayn u imanayay badbaadiye ahaan, iyo isagoo imaantinkiisa labaad yahay inuu dunida kala xukumo, shakina kuma jiro in labadaas casri ay isa soo galayaan. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:17.

c. Adeegsiga erayga “saacad” (*kairos*) waa hadal maldahan oo tilmaamya wakhti aan xaddidnayn (Yooxanaa 4:21, 23; 5:25, 28; 16:2).

2. “kasoo horjeesashada Masiixa” (aayadda 18).

a. Yooxanaa waxa uu adeegsanayaa “diidista Masiixa” (2:18, 22; 4:3; 2 Yooxanaa 7). Fiiro u yeelo 2:18 waxay isugu jirtaa jamac iyo keli (2 Yooxanaa 7).

1) Kuwo ka mida qorayaasha Axdiga Hore ayaa qofkan ku sheegaya inuu iman doono aakhiru samaanka.

a) Daanyeel – “waxshiga afraad” (7:7-8, 23-26; 9:24-27)

- b) Ciise – “baaba’ a” (Markos 13; Matayos 24)
 - c) Yooxanaa – “waxshiga badda kasoo baxaya” (Muujintii 13)
 - d) Bawlos – “aadanaha denbiga” (2 Tesaloniika 2).
- 2) Yooxanaa waxa uu kala saarayaa shakhsiga maalmaha danabe soo bixi doona iyo Ruuxa ama mawqifka kasoo horjeeda Masiixa ee dunida dhexdeeda (2:18; 4:3; 2 Yooxanaa 7; Markos 13; Matayos 24).
 - 3) Magac u yaalka Giriigga ah waxa loogala jeedi karaa (1) kasoo horjeeda ama (2) beddelka. Waa arrin muhiim ah iyada oo la adeegsanayo jamaca iyo kelida sida ku sugan aayadda 18. Taariikhdu waxa ay tusinaysaa kuwo badan oo kasoo horjeestay Ilaah iyo Masiixa (adeegsiga #1).
 - a) Antiochus IV Epiphanes (geeska yar ee Daanyeel 8; 11:36-45)
 - b) Nero iyo Domitian (sheegteen ilaahnimo laakiin masiixnimo maya)
 - c) Shuuciyadda Ilaah diidka
 - d) cilmaaniyada
 - waxa kaloo jira kuwo sheegtay inay yihiin Masiixa (adeegsiga #2).
 - a) Macallimiinta beenta ah ee ku sugan Markos 13:6, 22 iyo Matayos 24:5, 24
 - b) Hogaamiyayaasha bidcada ah ee casriga
 - c) Kasoo horjeedshada Masiixa (Daanyeel 7:8; 9:23-26, 24-27; 2 Tesaloniika 2:3; iyo Muujintii 13)
 - 4) Masiixiyiintu casri walba waxay arki doonaan macallimiin been ah oo diida Masiixa iyo kuwo kale oo sheegta inay yihiin Masiixa, laakiin maalin maalmaha ka mida, waxa iman doona wakhti uu shirka yeelan doono jidh gooni ah.
3. ku dhex jirista (aayadaha 19, 24, 27, 28)
 - a. Badanaa wacdiyayaasha waxa ay sheegayaan baahida loo qabo go’aanka gaar ahaaneed ee raacayaasha Masiixa, waana arrin wanaagsan, laakiin Kitaabku muhiimadda ma saarayo go’aannada, balse wuxuu saarayaa xernimada (Matayos 28:19-20).
 - b. Waxa lagama maarmaan ah isku xidhista caqiidada damaanad qaadka weligeed ah iyo caqiidada kusocoshada. Eeg Mawduuca Gaarka Yooxanaa 8:31. Ma jirto arrin lagu kala dooran karo, waayo labaduba waxay tusinayaan arrin kitaabi ah (Yooxanaa 15)!
 - c. Aayadaha ka hadlayay ku dhex jiristu waa Matayos 10:22; 13:1-9; Markos 13:13; Yooxanaa 8:31; 15:1-27; 1 Korintos 15:2; Galatiya 6:1; Muujintii 2:2, 7, 11, 17, 26; 3:5, 12, 21; 21:7. Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:10.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 2:3-6

³Oo taas aynu ku garanaynaa inaynu naqaan isaga, haddaynu qaynuunnadiisa adkayno. ⁴Kan yidhaahda, Waan aqaan isaga, oo aan qaynuunnadiisa adkayn, waa beenaaleh, oo runtu kuma jirto isaga. ⁵laakiin kan hadalkiisa adkeeya, runtii, Ilaah jacaylkiisu wuu ku dhan yahay isaga. Taas aynu ku garanaynaa inaynu isaga ku jirno. ⁶Kan yidhaahda, Isagaan ku jiraa, waa inuu u socdaa siduu isagu u socday.

2:3 “Oo taas aynu ku garanaynaa inaynu naqaan isaga” waa fal wakhti xaadirka jooga oo ku dhisan garasho. Waxa labada ficil ayaa tusinayaan in Masiixiyiinta kaniisadaha dhibaatoonayaa ay awoodi karaan inay helaana yaqiin dhammays tiran oo badbaadooda ah, iyadoo ka duwan sidii Gonostigu u garanyeen. Erayga “garasho” Cibraaniyada waxa loogu dhex adeegsaday isaga oo tusinaya xidhiidh gaar ah (Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5), dhinaca Giriigga waxay tusinaysaa garashada xaqiiqooyin gaar ah ama shakhsi. Injiilku haddaba wuxuu isugu jiraa shakhsi iyo xaqiiqo rumaysad ah. aayadahanina waxa ay xoojinayaan xaqiiqooyinka ah:

1. Inaan ogaan karo Ilaah
2. Waxa aan garan karnaa waxa uu nolosheenna ka rabo
3. Waxa aan garan karnaa inaynu garanayon! (5:13).

Xidhiidhka aan la leenahay Ilaah waxa uu ka muuqanayaa waxyaalaha aan samaynayo iyo ujeedooyinkeenu sida ay yihiin (Matayos 7; Yacquub, 1 Butros). Mawduucanina si joogto ah ayuu ugusoo noqnoqonayaa 1 Yooxanaa (2:3, 5; 3:24; 4:13; 5:2, 13).

Yooxanaa badanaa waxa uu erayga “garasho” u adeegsanayaa (*ginōskō* iyo *oida*) si isku mida, (27 jeer shanta cutub ee 1 Yooxanaa), eray kastaa waxa uu tusinayaa waxyaalihii wakhtigaas loogu adeegsan jiray Giriigga, laakiin waxay u muuqataa in ujeedada Yooxanaa ay la xidhiidho kala duwanaanshaha suugaanta, waxaana loo fiirsan karaa Yooxanaa oon adeegsanayn erayga *epiginōskō*.

Yooxanaa wuxuu qoraalka u samaynayaa si uu u dhiirri geliyo rumaystayaasha, iyo si uu u beeniyo waxyaalaha Gonositigu sheeganayaan ee beenta ah, waxaanu Injiilkiisa iyo waraaqdiisa koobaad ku adeegsanayaa erayga “garasho” isagoo ka badan kitaabada kale ee Axdiga Cusub oo dhan. Kitaabka Yooxanaa waxa uu ku dhisan yahay garashada Injiilka ee ay ka muuqanayso jacaylka iyo addeecista (kitaabka Yacquub).

▣ **“haddii”** waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah oo tusinaysa suurta galmimada xaqiijinta.

▣ **“qaynuunnadiisa adkayno”** u fiirso shuruudda (falka wakhti xaadirka jooga ee ku dhisan garashada). Axdiga Cusubi bixinta Ilaah wuxuu ku yahay shuruud la’aan, laakiin xagga aadanaha shuruud buu ku yahay (2:3-5; 3:22, 24; 5:2, 3; Yooxanaa 8:51-52; 14:15, 21, 23; 15:10; Muujintii 2:26; 3:8, 10; 12:17; 14:12). Addeecitaanku nuurka wuxuu u yahay caddaynta cusboonaysiinta runta ah (1 Samuu’eel 15:22; Yereemyaah 7:22-23). Addeecitaanku ma xaqiijiyo badbaadada, laakiin wuxuu u yahay caddayn, mana aha aasaaska balse waa midhaha.

2:4 “Kan yidhaahda” waa qaabka Yooxanaa adeegsanayo sidaan kor kusoo xusnay.

▣ **“Waan aqaan isaga,”** waa mid kamida hadalladii macallimiintii beenta ahaa (1:6, 8, 10; 2:4, 6, 9). Qaabka hadalkanina waxa uu u eegyahay sida Malaakii, Rooma, iyo Yacquub. Macallimiinta beenta ahi waxay sheegteen inay garanayaan Ilaah (falka ebyan), laakiinse waxay isku dayeen, inay badbaadada ka soocaan nolosha, waxaanay sheegteen garashada ka saraysa Ilaah, laakiinse qaab dhaqankooda ayaa tusiyay ujeedooyinkooda dhabta ah.

▣ **“oo aan qaynuunnadiisa adkayn”** waa magaca fal sameeyaha jooga ee ku dhisan garashada. Nolosheenu waxay muujinaysaa qaab dhaqankeena ruuxi ahaaneed (Matayos 7). Sida aayadda 4 u sheegayso xaqiiqadani waa qaab diidmo ah, halka aayadda 5 ay kaga tusinaysa qayb oggolaansho ah.

▣ **“waa beenaaleh”** ma jiro wax ka xun khiyaanaynta nafta ee kasitaanka ahi. Addeecitaanku waa caddaynta cusboonaysiinta runta ah, waayo midhihiina ayay idinku garan doonaan (Matayos 7). Yooxanaa waxa uu beenta ku sifaynayaa dad dhowra oo isku sheega inay diin leeyihiin (1:6, 10; 2:4, 20; 4:20), mana aha kuwo Ilaah hortiisa sax ku ah.

2:5 “laakiin kan hadalkiisa adkeeya” falka wakhti xaadirka joogaa waxa uu tusinayaa qaab nololeed sii socosho ah. qorayaasha UBS ka *A Handbook on The Letters of John* (Haas, Jonge, and Swellengrebel), waxa ay tusinayaan faallo xagga naxwe ahaaneed ah oo xiiso leh: “magac u yaalka Giriigga ah ee “*an*” ama “*ean*” waxa raaca fal qaabkiisu tahay u tiirin sida ku sugan 3:17, 22; 4:15; 5:15; III Yooxanaa 5. Taasina waxay u muuqataa inay tusinaysa dhacdo guud ahaaneed” (p.40). addeecitaanku wuxuu muhiim u yahay rumaysadka ku dhisan axdiga, tanina waa farriinta uu gudbinayo I Yooxanaa iyo Yacquub. Qofna ma sheegan karo inuu garanayo Ilaah, isaga oo diiddan erayga nool iyo ka qoran iyo inuu noolaado nolol ku dhisan akhlaaq (3:6, 9)!

▣ **“runtii, Ilaah jacaylkiisu wuu ku dhan yahay isaga.”** Waa fal ebyan oo tusmayn xambaarsan, waxaanu tusinayaa fal la dhammays tiray (4:12, 17, 18). Waxa aan lahubin haddii qaabka naxwe ee erayadani ay ka hadlayaan

1. Jacaylka Ilaah inaga inoo qabo (4:12)
2. Jacaylka aan inagu Ilaah u hayno (5:3)
3. Jacaylka Ilaah ee guud ahaan qalbiyadeenna ku jira

Erayga “dhammaystir” (*telos* 4:12, 17, 18), waxa ay tusinaysaa qaangaadh iyo diyaar garowga arrin gaar ah (Efesos 4:12), mana aha ka xoroobista buuxda ee denbiga (1:8, 10).

▣ **“Taas aynu ku garanaynaa inaynu isaga ku jirno.”** Waxa markale la xoojinayaa awoodda rumaystayaashu u leeyihiin xidhiidhka Ilaah. fahanka ku dhex jirista Ilaah iyo Masiixu waxa uu kusoo noqnoqonayaa qoraallada Yooxanaa (Yooxanaa 14:20, 23; 15:4-10; 17:21, 23, 26; 1 Yooxanaa 2:24-28; 3:6, 24; 4:13, 16).

2:6 “ku jiraa” eeg Mawduuca Gaarka ah 2:10. Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa in Aabbuhu inagu dhex jiro inaga (1 Yooxanaa 5:20) iyo sidoo kale in Aabbaha iyo Wiilku ay inagu dhex jiraan (Yooxanaa 14:23 iyo 17:21). U fiirso xitaa erayada oo xoojinaya mawduuca yaqiinta (2:6 “ku dhex jira Isaga”). Injiilku waa axdi shuruudeed ay la socoto saxsanaan iyo masuuliyadi.

▣ **“waa inuu u socdaa siduu isagu u socday.”** Waa xoojin kale oo ah “rumaysadka runta ah” sida qaab nololeedka (Yacquub 2:14-26). Rumaysadku maaha go’aan oo keliya, laakiin waa xidhiidh shakhsi ahaaneed oo lala yeesho Ciise iyo ku dayashada noloshiisa, noloshana waxa u ahaaday waxyaalo ka muuqda! Tani waxa ay la mid tahay sida ku soo aroortay 1:7. Ujeedada Masiixiyaddu maaha in lagu helo jano dhimashada dabadeed oo keliya, laakiin waa inaan imika ku noolaano nolosha Ciise oo kale (Rooma 8:29-30; 2 Korintos 3:18; Galatiya 4:19; Efesos 1:4; 1 Tesaloniika 3:13; 4:3; 1 Butros 1:15)! Waxa la inoo badbaadiyay inaan adeegno, siyda Sayidka loo diray ayaa inagana la inoo diray. Sidii naftiisa kuwa kale daraaddood uu hoos ugu dhigay, inaguna waa inaan nafteenna isugu aragno adeegayaal (1 Yooxanaa 3:16).

“Isaga” macno ahaan waa “Kaas,” waana mid caan ku ah qoraallada Yooxanaa “Ciise” (Yooxanaa 2:21; 19:35; 1 Yooxanaa 2:6; 3:3, 5, 7, 16; 4:17). Badanaana waxa loo adeegsadaa si dahsoon (Yooxanaa 7:11; 9:12, 28; 19:21).

Haddii “Kaasi” uu tilmaamayo Ciise, yaa uu tilmaamayaa “Isagu” sida ku sugan 6a? Yooxanaa qaabkan ayuu adeegsanayaa, waxaanay tilmaami kartaa Aabbaha (Yooxanaa 15:1-2, 9-10) ama Wiilka (Yooxanaa 15:4-6). Sidoo kalena waxa tanoo kale loogala jeedi karaa “Kan Quduuska ah” sida ku sugan aayadda 20.

NASB (UPDATED) TEXT: 2:7-11

⁷Gacaliyayaalow, qaynuun cusub idiin soo qori maayo, laakiin waxaan idiin soo qorayaa qaynuun hore oo aad tan iyo bilowgii haysateen. Qaynuunkii hore waa hadalkii aad bilowgii maqasheen. ⁸Oo weliba qaynuun cusub ayaan idiin soo qorayaa, kaas oo isaga iyo idinkaba run idinku dhex ah, maxaa yeelay, gudcurku waa dhammaanayaa, oo nuurka runta ahuna imminkuu iftiimayaa. ⁹Kan yidhaahda, Nuurkaan ku jiraa, oo walaalkiis neceb, wuxuu ku jiraa gudcurka ilaa imminkada. ¹⁰Kan walaalkii jecel, nuurkuu ku jiraa, oo wax lagu xumaado kuma jiro isaga. ¹¹Laakiin kan walaalkii neceb, gudcurkuu ku jiraa, oo gudcurkuu ku socdaa, oo garan maayo meeshuu marayo, waayo, gudcurkaa indhihiisa tiray.

2:7 “Gacaliyayaalow” Yooxanaa hadiyo goor akhristayaashiisa waxa uu kula hadlayaa erayo dabacsan (2:1). Eraygan waxa adeegsaday Aabbaha isaga oo tilmaamaya baabtiiskii Ciise (Matayos 3:17) iyo isbedelitaankii (Matayos 17:5). Waa hadal guud oo Yooxanaa waraaqihiisa ku adeegsanayo (3:2, 21; 4:1, 7, 11; iyo 3 Yooxanaa 1.2.5.11).

Textus Receptus ku waxa uu qaadanaayaa “walaalayaalow” (MSS K, L, NKJV), laakiin Yooxanaa mar keliya ayuu ku adeegsanayaa 3:13. Erayga “gacaliyayaalow” isna waxa taageeraya qoraal gacmeedyada Giriigga (8, A, B, C, P, iyo Vulgate, Peshitta, Copitic, iyo daabacaadaha Amerikanka ah). Eeg Bruce Metzger, A Textual Commentary On the Greek New Testament, p. 708.

▣ **“qaynuun cusub idiin soo qori maayo, laakiin waxaan idiin soo qorayaa qaynuun hore”** tani waa mid kamida qaabka Yooxanaa qoraalladiisu ay ku sifoobeena (Yooxanaa 13:34; 15:12, 17). Qaynuunkani maaha mid cusub dhinac marka laga eego dhinaca wakhtigeeda, laakiin waa dhinaca nooceeda. Rumaystayaasha waxa laga rabaa inay is jeclaadaan sida iyagaba Ciise u jeclaaday (Yooxanaa 13:34).

“qaynuunka hore” waxa loo fahmi karaa labo macnayaal

1. Sharcigii Muuse (Laawiyiintii 19:18)
2. Waxbaristii Ciise ee ku diiwaan gashan injiilka Yooxanaa (Yooxanaa 13:34; 15:12, 17)

MAWDUUC GAAR AH: “KU DHEX JIRISTA” KU SUGAN YOOXANAA QORAALLADIISA

Injiilka Yooxanaa waxa uu sifaynayaa xidhiidhka gaarka ah ee ka dhexeeya Aabbaha iyo Wiilka, waana xidhiidh qoto dheer oo ku dhisan sinaansho. Injiilka dhexdiisa Ciise waxa uu ku hadlayaa waxa uu ka maqlo Aabbaha, waxaanu samaynayaa waxa Aabbuhu samaynayo, mana aha mid kelidiis iska socda.

Is weheshigan iyo adeegitaankan isku xidhani waxa uu tusaale u yahay xidhiidhka u dhexeeya rumaystayaasha iyo Ciise. Xidhiidhkani maaha mid kelidiis soconaya (sida diimaha bariga), laakiin waxa uu ku baaqayaa ku dayashada nolol aad u heer sarraysa. Is weheshigani waxa uu ahaa (1) caqli ahaan (aragtida dunida ee injiilka oo ah Erayga Ilaah); (2) xidhiidh ahaaneed (Ciise waxa uu ahaa Masiixa Ilaah ee la ballan qaaday laguna kalsoonaan karo); iyo (3) akhlaaq ahaan (shakhsiyadda Ciise iyo noloshiisu waxay ka midha dhalisay rumaystayaal cibaado leh).

Ciise waa shakhsiga tusaalaha ah, waana Israa’iiliga runta ah, aadanahana waxa laga rabaa inay ku daydaan. Ciise waa “muuqaalka Ilaah,” sidaasi darteedna waxa uu soo celiyay muuqaalkii ee aadanaha ku lumay isga oo sameeyay (1) muujinta Ilaah; (2) isagoo bedelkeena u dhintay; iyo (3) isagoo aadanaha u keenay tusaale ay ku daydaan. Erayga “ku dhex jir” (*menō*) waxa ay ka tarjumaysaa ku dayshada Masiixa (Rooma 8:29), iyo soo celinta ka hor leexashadii (Bilowgii 3).

Aadanaha oo Ilaah weheshadaa waa ujeedada uu Rasuul Yooxanaa uga socdo “ku dhex jirista” halka isna Rasuul Bawlos isna uu uga adeegsanayo “Masiixa dhexdiisa.”

U fiirso adeegsiyada Yooxanaa:

1. Ku dhexjirista Aabbaha iyo Wiilka
 - a. Aabbaha oo ku dhex jira Wiilka (Yooxanaa 10:38; 14:10,11,20; 17:21,23)
 - b. Wiilka oo ku dhex jira Aabbaha (Yooxanaa 10:38, 14:10,11,20; 17:21)
2. Ku dhexjirista u dhaxaysa Ilaah iyo aadanaha
 - a. Aabbuhu wuxuu ku dhex jiraa rumaystaha (Yooxanaa 14:20,23; 1 Yooxanaa 3:24; 4:12-15)
 - b. Rumaystaha oo ku dhex jira Aabbaha (Yooxanaa 14:20,23; 17:21; 1 Yooxanaa 2:24,27; 4:13,16)
 - c. Wiilka oo ku dhexjira rumaysataha (Yooxanaa 6:56; 14:20,23; 15:4,5; 17:21,23)
 - d. Rumaystaha oo ku dhex jira Wiilka (Yooxanaa 6:56; 14:20,23; 15:4,5,7; 1 Yooxanaa 2:6,24,27,28)
3. Noocyo kale oo ku dhexjirista ah (hubaal)
 - a. Erayga Ilaah
 - 1) diidmo ahaan (Yooxanaa 5:38; 8:37; 1 Yooxanaa 1:10; 2 Yooxanaa 9)
 - 2) oggolaansho ahaan (Yooxanaa 8:31; 15:2; 1 Yooxanaa 2:14,24; 2 Yooxanaa 9)
 - b. Jacaylka Ilaah (Yooxanaa 15:9-10; 17:26; 1 Yooxanaa 3:17; 4:16)
 - c. Ruuxa Ilaah
 - 1) ee xagga Wiilka (Yooxanaa 1:32)
 - 2) ee xagga rumaystaha (Yooxanaa 14:17)
 - d. Addeecitaanku waa ku dhexjiris (Yooxanaa 15:10; 1 Yooxanaa 3:24)
 - e. Jacaylku wuxuu ku dhex jiraa nuurka (1 Yooxanaa 2:10)
 - f. Samaynta doonista Ilaah waa ku dhexjiris (1 Yooxanaa 2:17)
 - g. Subkistu way ku dhex jirtaa (1 Yooxanaa 2:27)
 - h. Runtu way ku dhex jirtaa (2 Yooxanaa 2)
 - i. Wiilku wuu ku dhex jiraa (Yooxanaa 8:25; 12:34)
4. Noocyo kale oo ku dhexjirista ah (diidmo)
 - a. Cadhada Ilaah (Yooxanaa 3:36)
 - b. Ku dhex jirista mugdiga (Yooxanaa 12:46)
 - c. Tuurista (ku dhexjiris la’aanta) (Yooxanaa 15:6)
 - d. Samaynta denbiga (ku dhexjiris la’aan) (1 Yooxanaa 3:6)
 - e. Jacayl la’aanta (ku dhexjiris la’aan) (1 Yooxanaa 3:14)
 - f. Dhiigya cabnimada (kuma dhexjirto nolosha weligeed ahi) (1 Yooxanaa 3:15)
 - g. Dhimashada dhexdeeda (1 Yooxanaa 3:14).

▣ “Qaynuunkii hore” sida ku sugan 2:3 erayga “qaynuun” waa jamac, halka ay meeshan ka tahay keli, waxaanay u muuqataa in jacaylku uu dhammays tirayo qaynuunnada kale oo dhan (Galatiya 5:22; 1 Korintos 13:13). Jacaylku waa ujeedada injiilka.

▣ **“waa hadalkii aad bilowgii”** falka ay dhammayska tirnayni waxa uu tilmaamayaa waxa ugu horreeya ee dhegaysataha loogu tilmaamayo farriinta injiilka (aayadda 24; 1:1; 3:11; 2 Yooxanaa 5-6).

▣ **“maqasheen”** The Text Receptus ayaa ku daraya erayada ah “tan iyo bilowgii” (waxaanu adeegsaday qaybtii hore ee aayadda).

2:8 “kaasoo isaga run ku dhex ah” magac u yaalku waxa uu iska bedelayaa dhediga sida ku sugan aayadda 7, kaasoo waafaqaya erayga “qaynuun,” si uu u noqdo magac uyaal tilmaamaya gebi ahaanba injiilka. Magac uyaalka sidan oo kale isu bedelaya waxa aan ka heli karnaa Efesos 2:8-9.

▣ **“gudcurku waa dhammaanayaa,”** waa fal wakhti xaadirka jooga (marka loo eego A. T. Robertson kitaakiisa *Word Pictures in the New Testament*, p. 212). Waxa soo baxay casrigii cusbaa isaga ooo kuna sii jiri doona qalbiyada iyo caqliyada kuwa Ilaah ku gartay Masiixa dhexdiisa.

▣ **“nuurka runta ahuna imminkuu iftiimayaa.”** Ciise waa nuurka dunida (Yooxanaa 1:4-5, 9; 8:12), waana tusaale lagu shabahayo runta, muujinta, iyo quduusnaanta. Eeg firada 1:5 iyo 1:7. Casrigii cusbaana wuu soo baxay.

2:9 “oo walaalkiis neceb” waa magaca fal sameeyaha ku dhisan garashada kaasi oo tilmaamaya fikir soconaya. Nacaybku waxa uu caddayn u yahay mugdiga (Matayos 5:21-26).

2:10 “Kan walaalkii jecel, nuurkuu ku jiraa” falalka jooga wakhti xaadirka ayaa qoraalkan aad ugu badan. Jacaylku wuxuu caddayn u yahay badbaadada rumaystaha iyo xidhiidhka gaar ahaaneed ee uu la leeyahay garashada runta iyo nuurka, waana qaynuunka cusub ee hore u jiray (3:11, 24; 4:7, 11, 21).

NASB, NKJV	“oo wax lagu xumaado kuma jiro isaga”
NRSV	“qofka sidaasa wax lagu xumaado kuma jiro”
TEV	“ma jiro wax inagu jira oo qof ku sababaya inuu denbaabo”
NJB	“ma jiro wax isaga ka dhigaya inuu xumaado”

Waxa jira labo fasiraadood uu suurto gal ah loona fasiri karo aayaddan:

1. Rumaystaha ku dhex socda jacaylku ma xumaado (aayadda 11)
2. Rumaystaha ku socda jacaylku kuwa kale kuma sababo inay leexdaan (Matayos 18:6; Rooma 14:13; 1 Korintos 8:13). Rumaystayaasha iyo kuwa aan rumaysadka lahayniba waxay ka faa’idaysanayaan Injiilka.

“ka dhigista” Axdiga Hore waxa ay kasoo horjeedaa rumaysadka. Ilaah doonistiisa iyo qaynuunadiisa waxa lagu metalaya jid la raaco, sidaasi darteedna “socod” waxa uu tusaale u yahay qaab nololeed. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 1:14.

2:11 “laakiin kan walaalkii neceb, gudcurkuu ku jiraa” waa magaca fal sameeyaha aan la garanayn. Necbaanshuhu waxa uu calaamad u yahay rumaysad la’aanta (3:15; 4:20). Qofka dhexdiisa kuma wada jiri karaan iftiin iyo mugdi, jacayl iyo necbaansho. Hadiyo goor Yooxanaa wuxuu adeegsanayaa hadalka cadaanka iyo madowga ah isaga oo ujeedadiisa uga socda. Marar badan rumaystayaasha waxay ka cawdaan degitaanka iyo dayacista ama jacayl la’aanta, laakiinse injiilku waxa uu keenayaa is bedel deg deg ah.

▣ **“gudcurkaa indhihiisa tiray”** waxa tani ay tilmaami kartaa rumaystaha oo kusii dhex jira denbiga (2 Butros 1:5-9), ama ficillada Shaydaanka (2 Korintos 4:4). Waxa jira saddex cadow oo aadanuhu leeyihiin: (1) nidaamka dunida luntay; (2) jarribaadda shaydaanka; iyo (3) daneecaddeena aadane ahaan leexatay (Efesos 2:2-3, 16; Yacquub 4).

NASB (UPDATED) TEXT: 2:12-14

¹²Wax baan idiin soo qorayaa, Carruurtiyey, maxaa yeelay, dembiyadiinnii waa laydinka cafiyey magiciisa aawadiis. ¹³Aabbayaashow, wax baan idiin soo qorayaa, maxaa yeelay, waad garanaysaan kan tan iyo bilowgii jira. Ragga dhallinyarada ahow, wax baan idiin soo qorayaa, maxaa yeelay, idinku kan sharka ah ayaad ka adkaateen. Carruurtaydiyey, wax baan idiin soo qoray, maxaa yeelay, Aabbaha waad garanaysaan. ¹⁴Aabbayaashow, wax baan idiin soo qoray, maxaa yeelay, waad garanaysaan kan tan iyo bilowgii jira. Ragga dhallinyarada ahow, wax baan idiin soo qoray, maxaa yeelay, waad xoog weyn tihiin, oo hadalka Ilaah baa idinku jira, oo kan sharka ah ayaad ka adkaateen.

2:12-14 dhammaanba falalka aayadahi waxa weeyi fal dhammays tiran (marka laga reebo “waxbaan idiin soo qorayaa” [NASB 1970], “waxaan soo qoray” [NASB 1995], UBS⁴ aya ku bixinaya “A” isagoo ku tirinaya [hubaal], isaga oo ka hadlayay fal tegay oo ka tegay natiijo. Yooxanaa halka uu macallimiinta beenta ah kagala hadlayo qaybtii hore, ayaa haddana waxa uu la hadlayaa rumaystayaasha waxaanu ku magacaabayaa saddex magac: “carruur yaryar, ” “aabbayaal, ” iyo “dhallinyaro”. Waxa haddaba loo badanayaa Yooxanaa inaanu la hadlayn saddex qaybood oo dadka ah, laakiin waa qaab hadaleedkiisa. Waxa jirta afar waxyaalood oo rumaystayaashu ay garanayaan:

1. Dhaafista denbiyadooda (aayadda 12)
2. Ciise ayay kaga adkaadeen sharka (aayadda 13)
3. Wehishigooda ay Aabbaha weheshanayaan (aayadda 14) iyo Wiilka (13-14)
4. Awoodda ay ku leeyihiin erayga Ilaah (aayadda 15).

▣ Naxwe ahaan arrinta waxa lagu cabiray inay ku bilaabmayo (1) “waxaan idiin soo qorayaa” iyo (2) lixda jeer ee hoti (maxaa yeelay).

2:12 “maxaa yeelay, dembiyadiinnii waa laydinka cafiyey magiciisa aawadiis” rajada aadanaha ee helitaanka denbi dhaafku waxa uu yahay mid lagu heli karo adeegii Ciise (fal ebyan oo ku dhisan garasho la’aan tusmayna wada). Xagga Cibraaniyada magacu waxa uu ka tarjumayaa shakhsiga iyo sifooyinkiisa (3:23; 3 Yooxanaa 7; Rooma 10:9-13; Filiboy 2:6-11).

Waxa jira lix *hoti* oo ah erayo taxane ah sida ku xusan aayadaha 12-14. Waxa laga yaabaa inay yihiin erayo si kas ah loo adeegsaday (NASB, NRSV, NJB, “maxaa yeelay”) ama waa qaab ah tusmaynta xaqiiqada (NET, “in”).

2:13 “kan tan iyo bilowgii jira” waxa adag in la garto magac u yaalku cidda haddii uu tilmaamayo Aabbaha ama Wiilka, laakiin macnaha aayaddani waxa uu tilmaamayaa Ciise. Isagu waxa uu ahaa mid weligiisba hore u jiray (Yooxanaa 1:1, 15; 3:13; 8:48-59; 17:5, 24; 2 Korintos 8:9; Filiboy 2:6-7; Kolosay 1:17; Cibraaniyada 1:3).

▣ **“ka adkaateen”** kani waa ballan qaad iyo digitaan marar badan soo noqnoqanaya (2:14; 4:4, 5:4-5, 18-19). Falku waa fal tegay oo ku dhisan garasho tusmayna wada oo tusinaya halka arrinka ugu sarraysa. Yooxanaa waxa uu wax u qorayaa si caddaan iyo madow ah, oo rumaystayaashu waxay xaqiijiyeen ka adkaantan, laakiin maaha mid dhammays tirmaysa ilaa mustaqbalka. Maadaama oo rumaystayaashu ay dhulka joogaan waxa ay la tacaalayaan denbiga iyo jarribaadda.

▣ **“kan sharka ah”** halkan waxa lagu tilmaamayaa shaydaanka sida ku sugan aayadda 14 oo kale, labada aayadood ee 14 iyo 13 na waa isku mid. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 12:31.

▣ **“maxaa yeelay, Aabbaha waad garanaysaan.”** Fahanka kitaabiga ah ee Cibraanigu waxa uu koobsanayaa erayga “garasho” waana xidhiidhka shakhsiyeed ee gaar ahaaneed (Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5), halka macnaha Giriigga ahi uu ka koobsanayo garashada xaqiiqada. Injiilku waa shaksi u baahan soo dhowayn (Ciise), sidoo kalena waa farriin (caqiido) u baahan in la aqbalo oo lagu dhaqmo.

MAWDUUC GAAR AH: GARO (badanaa iyadoo la adeegsanayo Sharciga Kunoqoshadiisa)

Erayga Cibraaniga ah ee “garo” (BDB 393) waxa uu leeyahay macnoyaal dhowr ah.

1. Fahanka wanaaga iyo sharka – Bilowgii 3:22; Sharciga Kunoqoshadiisa 1:39; Ishacyaah 7:14-15; Yoonis 4:11
2. In wax lagu garto fahan – Sharciga Kunoqoshadiisa 9:2,3,6; 18:21
3. In wax lagu garto khibrad – Sharciga Kunoqoshadiisa 3:19; 4:35; 8:2,3,5; 11:2; 20:20; 31:13; Yashuuca 23:14
4. In wax loo fiirsado – Sharciga Kunoqoshadiisa 4:39; 11:12; 29:16
5. Garashada shakhsi ahaan
 - a. Shakhsi – Bilowgii 29:5; Baxniintii 1:8; Sharciga Kunoqoshadiisa 22:2; 33:9
 - b. ilaa – Sharciga Kunoqoshadiisa 11:28; 13:2,6,13; 28:64; 29:26; 32:17
 - c. YHWH – Sharciga Kunoqoshadiisa 4:35,39; 7:9; 29:6; Ishacyaah 1:3; 56:10-11
 - d. Galmo – Bilowgii 4:1,17,25; 24:16; 38:26
6. Khibrad ama cilmi la barto – Ishacyaah 29:11,12; Caamoos 5:16
7. Xikmad lahoow – Sharciga Kunoqoshadiisa 29:4; Maahmaayadii 1:2; 4:1; Ishacyaah 29:24
8. Garashada Ilaah
 - a. ee Muuse – Sharciga Kunoqoshadiisa 34:10
 - b. ee Israa’iil – Sharciga Kunoqoshadiisa 31:21,27,29

2:14 “waad xoog weyn tihiiin” u fiirso in awooddoodu ay ku dhisantahay sugnaanshaha ay ku suganyihiin erayga Ilaah. hadalkani waxa uu la mid yahay ka Bawlos ee ku sugan Efesos 6:10-18. Erayga sugani waa Injiilka, waana guud ahaan iyo gaar ahaan, Ilaah ayaana keenay aadanahana waxa laga rabaa inay aqbalaan, waana go’aan iyo xernoqosho u baahan ku noolaansho.

▣ **“hadalka Ilaah baa idinku jira”** waxa ay si gaara u tilmaamaysaa erayga Ilaah (injiilka, aayadda 24). Halkan waxa ku sugan waxa kusoo arooray Yooxanaa 15. Waxaana loo adeegsaday macnaha diidmo ahaan sida ku sugan Yooxanaa 5:38 iyo 8:37.

▣ **“oo kan sharka ah ayaad ka adkaateen”** waxa ay adkaynaysaa sabirka qoduusiinta xaqiiqiga ah, adkayntanina waxay kusoo noqnoqonaysaa aayadaha 17, 19, 24, 27, 28; 5:18; iyo 2 Yooxanaa 9. Waxa lagama maarmaan ah in damaanaq qaadka rumaystuhu u baahan yahay inuu u dheeli tirnaado rumaysadka kuwa sida runta ah loo badbaadiyay ee ilaa weligood ku soconaya (Muujintii 2:7, 11, 17, 26; 3:5, 12, 21). Eeg Mawduuca Gaarka ah: Yooxanaa 8:31. Aayaddan macneheedu maaha in rumaystayaashu ay hadda yihiin kuwo aan denbi lahayn, inkasta oo taasi ay suurto gal ku tahay shaqadii Masiixu dhammays tiray (Rooma 6).

NASB (UPDATED) TEXT: 2:15-17

¹⁵Dunida iyo waxyaalaha dunida ku jira toona ha jeclaanina. Qof uun hadduu dunida jeclado, jacaylka Aabbuhu kuma jiro isaga. ¹⁶Maxaa yeelay, waxaa dunida ku jira oo dhan oo ah damaca jidhka, iyo damaca indhaha, iyo faanka nolosha, xagga Aabbaha kama yimaadaan ee waxay ka yimaadaan xagga dunida. ¹⁷Oo duniduna way idlaanaysaa, iyo damaceduba; laakiin kan doonista Ilaah yeelaa wuu jirayaa weligiis.

2:15 “ha jeclaanina” waa fal amar ah oo wakhti xaadirka jooga kuna dhisan garasho, isaga oo tilmaamaya joojinta arrin hore u socotay. Jacaylka dunidu waxa uu ahaa fikir ay rumaysnayeen kooxihii Gnostigu.

▣ **“dunida”** Yooxanaa erayga duni waxa uu u adeegsanayaa labo macnayaal Axdiga Cusub dhexdiisa: (1) dhulka ama caalamkan la abuuray (Yooxanaa 3:16; 16:33; 1 Yooxanaa 4:14) iyo (2) mujtamaca aadanaha oo u shaqaynaya si ka dhan ah Ilaah (1 Yooxanaa 2:15-17; 3:1, 13; 4:45; 5:4-5, 19). Ka hore waxa uu tilmaamayaa bilowgii abuuritaanka (Bilowgii 1-2) ka labaadna wuxuu sheegayaa aadanaha leexday (Bilowgii 3). Eeg Mawduuca Gaarka ah: *Kosmos* 14:17.

MAWDUUC GAAR AH: DAWLADDA AADANAHA

I. HORDHAC

- A. Qeexid—dawladdnimada waa aadanaha oo nafahaantooda isu agaasimaya si ay u helaan oo ay u dejiyaan baahiyada jidh ahaaneed (Bilowgii 4 iyo 11). Dadku waa mujtamaca aadanaha (Bilowgii 2:18), waxaanay isugu jiraan qoysas, qabiilo, umado ka koobad dadwayne.
- B. Ujeeddo—Ilaah aya dooray in kala dambayntu ay dejiso fawdada.
 1. Sharci-dejintii Muuse, gaar ahaan Diwaankii, waxa uu ahaa Ilaah doonistiisa oo uu aadanaha uga dhigayo bulsho ahaan. Waxay jimaysaa caabudaadda iyo nolosha.
 2. Ma jiro hab ama qaab dawladeed oo looga dooday Qorniinka, in kastoo Masiixiyiintii hore ee Israa'iil ay ahayd xukun Ilaah oo samada laga sugayey. Dimuquraadiyad ama shuuciyad midna kuma jirto runta Kitaabka Qudduuska ah. Masiixiyiintu waa in ay si ku habboon u sameeyaan wax kasta oo nidaam dawladeed ah oo ay naf ahaantooda u helaan. Ujeedka Masiixigu waa gaarista dad iyo adeegga Ilaah, ma aha kacaan.
- C. Asalkii dawladdnimada aadanaha
 1. Roomaan Kaatooliggu waxa ay tilmaameen in dawladdnimada aadanuhu ay tahay mid dhaxal ah oo ay si dhab ah ugu baahan yihiin, xitaa dhiciddii ka hor. Aristotle, ayaa waxaad isna mooddaa in uu ballantan ku raacay wuxuu odhanayaa, “ninku waa xoolo siyaasadeed” oo middana waxa uu ula jeeday in dawladdu “ay ku dhex jirto abaabulka nolosha wanaagsan.”
 2. Nidaamka Protestant-ka, gaar ahaan Martin Luther, waxa uu ku tilmaamay in dawladdnimada aadanuhu ay tahay dhaxal ay heleen dhiciddii gudaheeda. Wuxuu iyada ugu yeeray, “Boqortooyada Ilaah Gacanteeda Bidix.” Waxa uu sheegay, “in Ilaah waddadiisa uu ku xakamayn karo ninka xun ay tahay in uu ku xukumo nin xun.”
 3. Karl Marx isna waxa uu ku tilmaamay in dawladdu ay tahay mid ay dhowr dooran ay culaysyada ku ilaaliyaan xukunka. Isaga xaggiisa, dawladda iyo diintu door isku mid ah ayey cayaaraan.

II. WAXAYAABAHA BAYBALKA

A. Axdigii Hore

1. Israa'iil waa naqshadda ama muunadda samada la keeni lahaa. Israa'iishii hore dhexdooda waxaa boqor ka ahaa YHWH. Halkan waxaa ah “Theocracy” oo ah erey lagu caddaynayo Ilaah sharcigiisa tooska ah (cf. Samuu'eel 8:4-9).
2. Boqornimada Ilaah eek u jirta dawladdnimada aadanaha waxaa so toos ah looga dhex arki karaa:
 - a. Dhammaan boqorrada, Daanyeel 2:21; 4:17,24-25
 - b. Xukunka Masiixa, Daanyeel 2:44-45
 - c. Nebukhadnessar, Yeremyaah 27:6; Daanyeel 5:28
 - d. Cyrus II (Aasiya), 2 Taariikhidii 36:22; Cesraa 1:1; Ishacyaah 44:28; 45:1

1. Dadka Ilaah waa in ay noqdaan kuwo isku dhiiba oo xushmeeya xitaa dawladdaha ku duullaanka ah ee cabbudhinaya:
 - a. Daanyeel 1-4 Nebukadnessar
 - b. Daanyeel 5, Beelshaasar
 - c. Daanyeel 6 Dariyus
 - d. Cesraa iyo Nexemyaah
2. Yahuudaha la soo celiyay waxay ahayd inuu u tukado Cyrus iyo farcankiisa xukunkooda
 - a. Cesraa 6:10; 7:23
 - b. Yuhuuddu waxay u ducaynayaan xukuumadda, Mishnaah, Avot 3:2

B. Axdiga Cusub

1. Ciise xushmad ayuu tusay dawladdaha aadanaha
 - a. Matayos 17:24-27; wuxuu bixiyey cashuurtii Macbudka, xukuumadda iyo hogaamiyayaasha diintuna isku mid bay ahaayeen, 1 Butros 2:17
 - b. Matayos 22:15-22; Markos 12:13-17; Luukos 20:20-26, meel ayuu ugu dooday cashuurtii Roomaanka iyo sidoo kale xukuumaddii Roomaanka
 - c. Yooxanaa 19:11, Ilaah ayaa bixiya xukunka shacabka

2. Ereyadii Bawlos oo la xidhiidhay dawlada bani aadanka
 - a. Rooma 13:1-5, rumaystayaashu waa inj ay isku dhiibaan oo ay u duceeyaan xukuumadaha shacabka
 - b. Rooma 13:6-7, rumaystayaashu waa inay dhiibaan cashuurta dawladda
 - c. I Timoteyos 2:1-3, rumaystayaashu waa in ay u duceeyaan xukuumadaha shacabka
 - d. Tiitos 3:1, rumaystayaashu waa in ay ka dambeeyaan kuwa amarka sare leh
3. Eeyadii Butros ee la xidhiidhay dawlada bani aadanka
 - a. Falimaha Rasuullada 4:1-31; 5:29, Butros iyo Yooxanaa Senherdin horteeda (tani waxa ay muujinaysaa addeecista la'aanta shacabka)
 - b. I Butros 2:13-17, rumaystayaashu waa in ay isku dhiibaan ama ka dambeeyaan kuwa amarka sare leh
4. Ereyadii Yooxanaa ee la xidhiidhay dawlada bani aadanka
 - a. Muujintii 17, Taalladii Baabel waxa ay u taagnayd dawladda aadanaha oo Ilaah ka soo hor jeesatay
 - b. Muujintii 18, Baabel oo la baabiiyay

III. GABAGGABO

- A. Dawladnimada aadanaha xagga Ilaah ayaa laga amraa. Tani ma aha “xaquuqda rabbaaniga ah ee Boqorrada.” Laakiin meesha rabbaaniga ah ee dawladda. Ninna kan kale ugama doodi karo.
- B. Waa waajibaad diini ah in rumaystaashu ay ku addeecaan xukuumadda shacabka garaad ama dareen xushmad.
- C. Qaas ayey rumaystayaasha u tahay in ay dawladda aadanaha u saacidaan canshuurta iyo u ducaaynta.
- D. Dawladnimada aadanuhu waa ujeeddada amarka ama kala dambaynta. Ilaah ayey sidan adeegayaal ugu yihiin xagga dhawrista adduunka.
- E. Dawladnimada aadanuhu ma aha qorshaha ugu dambeeya. Waa mid xukunkeeda ku eg.rumaystaashu waa in ay wax ka sameeyaan amarrada u yaal dartood oo ay ku diidaan xukunka shacabka haddii ay ka hor yimaadaan haddii ay cagta ka soo gudbiyaan xadkii loo doortay. Sidii Augustine uu ku tilmaamay *The City of God*, waxaan haysannaa labo dhalashom mid waa mid aan joogto ahayn midna waa tan weligeed ah (Filiboy 3:20). Labadaba masuuliyad ayaannu ku lenahay, laakiin waa in la ogaadaa Ilaah Boqortooyadiisa ayaa ah qorshaha ugu dambeeya! Waa shaqsi ahaan iyo urur ahaan masuuliyaddeena aan Ilaah masuulka uga nahay.
- F. Waan ku dhiiri gelinaynaa in rumaystayaashu ay ka qayb qaataan nidaamka dimuqraadiyada oo ay ka qayb galaan hannaanka dawladda oo ay hir geliyaan, haddii ay macquul tahay, barista Qorniinka.
- G. Is beddel gaar ah waa in uu ka muuqadaa marka shaqsigu Ilaah u soo noqdo. Ma jirto rajo waaraysa oo ku jirta dawladnimada. Dawladaha aadanaha oo dhan , inkastoo uu adeegsada oo ay doonis Ilaah ahaayeen, waa dabeecadda is biirsiga aadanaha dembiga badan tan ka soocda iyaga Ilaah. aragtidan waxaa lagu qeexay adeegsigii Johannine “adduunka” (1 Yooxanaa 2:15-17).

▣ **“iyo waxyaalaha dunida ku jira toona”** waxay u muuqataa in midan loogala jeedo jeclaysiga waxyaalaha maaddiga ah ee dunida ku sugan (aayadda 16) ama arrimaha dunidu soo ban dhigto ee igu jirta awood iyo saamayn (Rooma 12:2; Yacquub 1:27). Dunidan luntay waxay iksu daydaa inay daboolaan baahida aadanaha iyagoo ka gaar ah Ilaah, waxaanay u nidaamiyaan arrimaha aduunyada si muujinaysa in ay Ilaah ka gaar yihiin, nidaamyada arrimahan ku faraxsanina waxa ay noqonayaan kuwo la mida sanam caabudista iyo ka gaar noqoshada Ilaah, waxaana kuwaas tusaale ahaan loogu soo qaadan karaa: (1) nidaamyada xukuumadaha aadanaha; (2) nidaamyada waxbarista aadanaha; (3) nidaamyada dhaqaale ee aadanaha; iyo (4) nidaamka caafimaad ahaaneed, iwm.

Augustine ayaa yidhi, “Aadanaha waxa ku jira dalool qaabka Ilaah ah” noloshiisa, waxaanay isku dayaan inay daloolkan ku buuxiyaan arrimaha aduunyada, laakiin waxaan suurto gal ahayn inay helaana nabad geliyada

iyo isku fillaanshaha buuxa, kaasi oo lagu heli karo Ilaah oo keliya! Ilaah oo laga gees noqdaa waa inkaartii Ceeden!

▣ **“haddii”** waa weedh shuruudeed heerka saddexaad ah. waxa aan jecelnahay waa muujinta waxa ina haysta, ha ahaado Ilaah ama Shaydaanka ee.

2:16 “damaca jidhka” waxa ay middani tilmaamaysaa dherginta waxyaalaha jidhka aadanaha ee leexday uu rabo (Galatiya 5:16-21; Efesos 2:3; I Butros 2:11). Eeg Mawduuca Gaarka ah: Yooxanaa 1:14.

▣ **“damaca indhaha”** Yuhuuddu waxay rumaysnaayeen indhuhu yihiin albaabka nafta. Denbigu wuxuu ka bilaabmaa qaab nololeedka, waxaanu ku dhamaadaa falitaanka, iyadoo markaasna falalka qofku noqodaan qaab nololeed (Yooxanaa 19:13).

▣ **“iyo faanka nololaha”** middani waxa ay tilmaamaysaa faanka aadanaha ee gaarka ka ah Ilaah, waana iyaga oo ku kalsoon ilhooda u gaarka ah. *The Jerome Bible Commentary*, vol. II, ayaa Rymond Brown oo ah caalim Kaatolig ahi ku leeyahay: “Erayga *alazoneia*, waxa laga helayaa waraaqda Yacquub 40:16, waxaanay xanbaarsantahay macno ka xeel dheer faanka iyo kibirka oo qudha, waxaanay sheegaysaa isla waynaan iyo rumaysashada in la isku filanyahay” (p. 408).

Erayga nolol ayaa waxa loo tarjumay *bios* taasi oo tilmaamaysa nololaha ku meel gaadha ah ee dhulka (waana midda uu dadku la wadaago xayawaanka iyo dhirta, 1 Yooxanaa 3:17). Arrintani waxay tilmaamaysaa macallimiintii Gonostiga ee beenta ahaa, iyo sidoo kale kuwa aan rumaysadka lahayn, mararka qaarna waxay tilmamaysaa rumaystayaasha aan bislaanin!

▣ **“xagga Aabbaha kama yimaadaan ee waxay ka yimaadaan xagga dunida”** Masiixiyiinta waxa laga rabaa in aanay jeclaanin dunida oonay isu wada dhiibin labo sababood aawadeed:

1. Maxaa yeelay jacaylkani kamuu ahaanin Aabbaha (aayadda 16)
2. Dunidu waa ay tegaysaa waanay dhammaanaysaa (aayadda 17)

2:17 “duniduna way idlaanaysaa” waa fal wakhti xaadirka jooga tusmayna wada (2:8). Fahankani waxa uu la xidhiidhaa Yuhuudda oo rumaysnayd jiritaanka labo casri, wakhtiga ama casriga jooga, iyo casriga iman doona. Casrigii denbiga iyo caasinimaduna tegaysaa oo taasi shaki ma laha (Rooma 8:18-25).

MAWDUUC GAAR AH: FACAN IYO FACA IMAN DOONA

Nebiyadii Axdigii Hore waxay mustaqbalka ku muujiyeen badnaanta waqtiga la joogo. Iyaga ahaan mustaqbalku waxa uu u ahaan doonaa dib u soo celinta Israa’iil ee xagga dhulka. Arrintu si kastaba ha ahaatee, xitaa waxa ay arkeen maalin cusub (cf. Ishacyaah 65:17; 66:22). Diidmadii soo noqnoqonaysay ee ay YHWH ku diideen farcankii Ibraahim (xitaa masaafurintii kaddib) tusaale cusub ayaa Yuhuuddii ka dhex samaysmay sida ku qoran Qoraallada intertestamental apocalyptic ee (i.e., I Enoch, IV Cesraa, II Baruch). Qoraalladani waxa ay bilaabeen in ay kala badhaan labada fac: facan jooga ee sharka leh ee uu shaydaanka u taliyo iyo faca iman doonaa ee uu u taliyo Ruuxa oo ku Masiixa ku jira (askari mar kasta awood leh).

Barashada fiqiganee (eschatology) wax horumar cad ihi kama muuqdo. Dadka fiqigu waxay miidan ugu yeedhaan “progressive revelation” “muujin waxtar leh.” Axdiga Cusub waxa uu qirayaa runtan runtan caalamiga ah ee ee labada fac ama jiil (i.e., temporal dualism) (deegaan ku meel gaar ah):

<u>Ciise</u>	<u>Bawlos</u>	<u>Cibraaniyada</u>
Matayos 12:32	Rooma 12:2	1:2
Matayos 13:22 & 29	I Korintos 1:20; 2:6,8; 3:18	6:3
Markos 10:30	II Korintos 4:4	11:3
Luukos 16:8	Galatiya 1:4	
Luukos 18:30	Efesos 1:21; 2:1,7; 6:12	
Luukos 20:34-35	I Timoteyos 6:17	
	II Timoteyos 4:10	
	Tiitos 2:12	

FiqigaAxdiga Cusub ee labadan fac ee Yuhuudda waa la daboolay sababtuna waa filasho la'aanta iyo saadaalinnada labada imaansho ee Masiixa. Dhalashadii labaad ee Ciise ayaa kaamishay wax sii sheegidyadii Axdigii Hore ee ku soo bixidda faca cusub. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Axdigii Hore xataa waa uu arkay u imaanshadiisii sida xaakin iyo mid aan laga guulaysan Karin, welibase wuxu markii koowaad u yimid sidii Adeege Silcaya (cf. Ishacyaah 53), oo is hoosaysiinaya (Sekariyaah 9:9). Sidoo uu Axdigii Hore u saadaaliyey awood ayuu la soo noqon doonaa (cf. Muujintii 19) labadan hab ee kaamilista ah ayaa Boqortooyada ka dhigtay mid haddadan joogta (lagu dhex jiro) laakiin mustaqbalka ah (aan dhammaan la wada kaamilim). Tan ayaa ah xiisadda uu Axdiga Cusub qabo ee ah durba, maaha weli!

☐ **“laakiin kan doonista Ilaah yeelaa wuu jirayaa weligiis.”** Fiiro u yeelo sida nolosha weligeed ah (macno “jiraysa”) ay ula xidhiidho nolsoha ku dhisan jacaylka, een ahayn oo keliya go'aan wakhti hore la qatay (Matayos 25:31-46; Yacquub 2:14-26). Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 4:34.

NASB (UPDATED) TEXT: 2:18-25

¹⁸Carruurtiyey, waa saacaddii u dambaysay, oo sidaan maqasheen inuu kan Masiixa ka geesta ahi imanayo, weliba, imminka kuwa badan oo Masiixa ka gees ah ayaa kacay, taa aawadeed ayaynu ku garanaynaa inay saacaddii u dambaysay tahay. ¹⁹Way inaga baxeen, laakiin kuweennii ma ay ahayn; hadday kuweennii ahaayeen, way inala joogi lahaayeen; laakiin way inaga baxeen oo taasaa caddaynaysa inaanay kulligood inaga mid ahayn. ²⁰Laakiin idinku waxaad leedihiin subkid ka timid Kan Qoduska ah, oo wax walba waad taqaanniin. ²¹Wixii aan idiin soo qoray uma aan soo qorin aqoonla'aantiinna xagga runta aawadeed, laakiin waxaan u soo qoray aqoonta aad runta taqaanniin iyo inaanay beenina runta ka iman aawadood. ²²Waa kuma beenaaluhu, kan dafira inuu Ciise yahay Masiixa mooyaane? Isagu waa kan Masiixa ka geesta ah, waana kan dafira Aabbaha iyo Wiilkaba. ²³Ku alla kii Wiilka inkiraa, ma leh Aabbaha; laakiin kan Wiilka qirtaa Aabbuhuu leeyahay. ²⁴Haddaba idinku waxaad tan iyo bilowgii maqlayseen ha idinku sii jiro. Haddii wixii aad tan iyo bilowgii maqlayseen idinku sii jiro, idinkuna waxaad ku sii jiri doontaan Wiilka iyo Aabbaha. ²⁵Oo kanu waa ballankii uu inoogu ballan qaaday oo ah nolosha weligeed ah.

2:18 “Carruurtiyey” eeg fiirada 2:1.

☐ **“waa saacaddii u dambaysay”** macnaha xaraf ahaaneed waa “saacad danbe” iyadoonu la soconin shaqalku, waxaanay u eegtahay “ayaamaha danbe” taasi oo lagu adeegsaday Axdiga Cusub, iyadoo sifaynasa Imaatinka Labaad ee Ciise (Yooxanaa 6:39-40, 44). Waa fahan muhiim ah uu ku sugan qoraallada Yooxanaa, maxaa yeelay maalmeheenan mufasiriin badan ayaa uu saameeyay C. H. Dodd fahankiisa “aakhirada la rumaysan yahay” (mid ka mida tiirarka madrasadda amillennialisamka). Waxa aan shaki ku jirin Yooxanaa oo ogsoonaan imaatinka boqortooyada Ilaah oo ah jidh soo qaadashada Ciise Masiix, laakiin macnaha halkani waxa uu tusinayaa dhammays tirka wax mustaqbalka ah (dhacdo ama wakhti), labadubana waa run. Halkan waxaan ka arkaynaa fikirka boqortooyada joogta een weli dhammays tirmin, ama labadii casri ee Yuhuudda, kuwaasoo ahaa ka jooga iyo kan iman doonay.

☐ **“Masiixa ka geesta ah...kuwo badan oo Masiixa ka gees ah”** waxay eraydani marna yihiin keli marna waa jamac; labadaba midkoodna ma laha shaqal (MSS a*, B, C). Yooxanaa oo keliya ayaa eraydan ku dhex adeegsanaya Axdiga Cusub (2:18, 22; 4:3; 2 Yooxanaa 7). Eeg fiirada Fahanka Macnaha Guud ee 2:3-27, D.

☐ **“imanayo”** waa fal wakhti xaadirka jooga isagoo ah fal uu badanaa inta lagu adeegsaday Giriiggu uu yar yahay. Wakhtiga xaadirka ah ee joogaa waxa uu tusinayaa dhacdo mustaqbalka imanaysa oonu shaki ku jirin. Ka geesnimada Masiixa, iyo sidoo kale macallimiinta badan ee beenta ah, iyo kuwo masiixa sheeganaya ee beenta ahi waa ay soo baxayaan (Masiixa ka gees ahayaal).

Fahan ahaan waxa suurto gal ah in la yidhaahdo, xitaa Shaydaanku garan maayo wakhtiga labaad ee Masiixu uu soo laaban doono, oo isaguna waxa uu samaysanayaa masiixiyo been ah oo uu dunida ku maamulo ilaa inta uu jaaniska ka haysto.

▣ **“ayaa kacay”** waa fal ebyan oo ku dhisan garasho isagoo tusmayna wada. Ruuxda ah “ka geesnimada Masiixu” waxa weeyi mid joogta oo ka dhex shaqaynasa dunidan luntay (tusaale ahaan macallimiinta beenta ah), laakiin ruuxdani mustaqbalka meel ayay ku dhammaan doontaa. Kuwo ka mida mufasiriinta ayaa rumaysan in halkan lagu tilmaamayay Boqortooyadii Roomaanka ee maalmihii Yooxanaa, halka kuwo kalena ka rumaysan yihiin, inay tilmaamayso boqortooyo caalami ah oo mustaqbalka ah. Waxaana suurto gala in labaduba sax san yihiin! Saacaddii danbe waxay ku timid Masiixa iyadoo ku dhammays tirmi doonta Imaatinka Labaad ee Masiixa.

2:19 “Way inaga baxeen, laakiin kuweennii ma ay ahayn” waa tusaale wanaagsan oo ku saabsan macallimiinta beenta ah iyo qirashooyinka beenta ah ee ku dhex sugan kaniisadda (Matayos 7:21-23; 13:1-9, 18-23, 24-30). Yaraanta jacaylkooda ayaa caddayn u ah rumaysad la’aantooda, hadiyo goorna bidcooyinku waxay ka yimaaddaan gudaha!

Yooxanaa falalka wakhtiga ee kitaabkiisan uu ku adeegsanayo si aada ayuu uga fiirsanayaa. Aayadda 19 waxay ka tarjumaysaa

1. Macallimiintii beenta ahayd oo baxay (fal tegay)
2. Run ahaan inagamay mid ahayn (falka wakhti xaadirka jooga ee soconaya)
3. Hadday naga mid ahaan lahaayeen may baxeen (jumlad shuruudeed heerka labaad ah oo uu la socdo fal wakhtigii tegay ahi).

Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 17:12.

▣ **“haddii”** waa weedh shuruudeed heerka labaad ah oo tilmaamaysa wax liddi ku ah xaqiiqada, waxaana loo tarjumi karaa “hadday naga mid ahaan lahaayeen nagamay mid ahaynee, way nala joogi lahaayeen, laakiin nalamay joogin.”

▣ **“way inala joogi lahaayeen”** falka garashada ku dhisan waxa uu tilmaamayaa wax la dhammays tiray wakhtigii tegay. Waxa ay middani markale sheegaysaa caqiidada qoduusiinta (aayadaha 24, 27, 28), rumaysadka runta ahi wuu sugnaanayaa midhona wuu dhalayaa (Matayos 13:1-23). Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 8:31.

2:20 “idinku waxaad leedihiin subkid ka timid Kan Qoduuska ah” aayaddani waxay kasoo horjeeddaa wixii kusoo arooray aayadda hore iyadoo tilmaamaysa kuwa ka tegay is weheshiga Masiixinimada. Waxa suurto gal ah in Gonostiga ay saamayeen diimihii barigu, iyagoo markaasna ku shaqeyay nidaam ay iyagu ku sheegeen in lagu garan karo Ilaah laguna weheshan karo. Yooxanaa waxa uu haddaba sheegayaa subkistani inay u ahaatay rumaystayaasha, oonay u ahaanin Gonositiga.

MAWDUUC GAAR AH: KAN QUDUUSKA AH

“Kan Quduuska ah” waxa ay tilmaami kartaa:

1. Ilaaha Aabbaha ah (Axdiga Hore “Kan Quduuska ah ee Israa’iil”)
2. Ilaaha Wiilka ah (Markos 1:24; Luukos 4:34; Yooxanaa 6:69; Falimaha Rasuullada 3:14)
3. Ilaaha Ruuxa ah (“Ruuxa Quduuska ah” Yooxanaa 1:33; 14:26; 20:22).

Falimaha Rasuullada 10:38 ayaa ah aayad lagu sheegay saddexda shakhsiyadood ee Ilaahnimada. Ciise waa la subkay (Luukos 4:18; Falimaha Rasuullada 4:17; 10:38). Halkana waxa aan ka arkaynaa iyadoo fahanka subkistu uu ballaadhanayo oo noqonayo rumaystayaasha oo dhan (1 Yooxanaa 2:27). Kan la subkay waxa uu noqday kuwa la subkay! Waxa ay tani la simantahay kan iyo kuwa ka geesta ah Masiixa (1 Yooxanaa 2:18). Caadi ahaan Axdiga Hore subkitaanku wuxuu ahaa subkitaanka saliidda (Baxniintii 29:7; 30:25; 37:29) iyadoo la xidhiidhay kuwa qabsanayay adeeg gaar ah oo ka ahaaday Ilaah (nebiyada, wadaadada, boqorrada). Erayga “Masiix” ayaa luqada Cibraaniga looga tarjumay “ka la subkay” ama Messiah

▣ **“subkid”** eeg Mawduuca Gaarka ah: 11:2

▣

NASB

“wax walba waad taqaanniin”

NKJV

“waxkastana waad taqaanaan”

NRSV

“dhammaantiina aqoonbaad leedihiin”

TEV “sidaas darteedna dhammaantiin waad ogtihiin runta”
NJB “dhammaantiin waxaad hesheen aqoon”

Waa hadal muhiim ah oo ku socda iftiinka waxyaalihii ay sheeganayeen macallimiinta Gonostiga ee beenta ahaa, marka la eego waxa la xidhiidha garashadooda sirta ah. Yooxanaa waxa uu adkaynayaa in Masiixiyiintu ay ay garashada asaas u yihiin (aayadda 27 iyo Yooxanaa 16:7-14 iyo Yeremyaah 31:34), mana jirto garasho kale oo ku sugan diin amaba cilmiyada kale (3:2). Yooxanaa marka loo eego runtu waa fahan iyo shakhsi, waana sida ay tahay subkista laga yaabo inay sheegayso injiilka ama Ruuxa.

Waxa jira kala duwanaansho ah qoraal gacmeedyada Giriigga. NKJV gu waxa uu raacayaa A, C, iyo K, isagoo dhigaya *panta*, halka NASB uu ka raacayo qoraal gacmeedyada a, B, iyo P, oo dhigaya *pantes*, kaasi oo diiradda saaraya fal sameeyaha. Marka la eego waxbaristii macallimiinta beenta ahayd, ikhtiyaarka labaad ayaa ah kan ugu habboona. Garashada iyo subkista waxa la siiyay rumaystayaasha oo dhan mana aha fikir ruuxi ahaaneed oo gaar ah.

2:21 aayaddani waxay ka mid tahay aayado dhowra oo Yooxanaa uu akhristayaashiisa ugu adkaynayo, inay leeyihiin damaanad qaadka badbaadada iyo garashada runta. Middanina waxay ku dhisan tahay subkista Ruuxa Quduuska ah, kaasi oo rumaystayaasha ku dhaliya gaajada ay u qabaan Injiilka.

2:22 “Waa kuma beenaaluhu” erayadani waxa ay wataan shaqal, sidaasi darteedna Yooxanaa waxa uu lahadlayaa mid ahaan:

1. Macallin beenaale ah oo gaar ah (suurta gal ahaan Cerinthus)
2. Ama “beenta wayn” iyo diidmada Injiilka (5:10)

“beenaale” waxa ay la simantahay “ka gees ah Masiixa,” ruuxda ka geesta ah Masiixuna casri walba waxa ay ku jirtaa kuwa diida Masiixa, ama mid kasta oo isku daya inuu meesha Masiixa dejiyo kuwo kale.

▣ **“inuu Ciise yahay Masiixa mooyaane?”** Jerome Biblical Commentary, p. 408, ayaa si fiican uga hadlayay: “Qoraagu ugalama jeedo oo keliya in Ciise uu buuxiyay waxyaalihii Yuhuuddu ku filayeen Axdiga Hore ee ku saabsanaa Masiixa. ‘Masiixa’ halkan waxa ay ku wadataa macnaha buuxa ee Axdiga Cusubi u gaar yeelay Ciise, waana sida qoraagu ereyadii Ciise u faafinayo, isaga oo ahaa Badbaadiyaha aadanaha (Falimaha Rasuullada 2:31; Rooma 1:4).”

Waxa suurto gal ah in caqiidadani ay ku shaqaynaso

1. Iyadoo kasoo horjeedda waxbarista beenta ah ee Gonostigga
2. Inay tahay qaab si cad loogu kala saarayay Sinagooga iyo kaniisadda; waxaana laga yaabaa inay ka tarjumayso qaabkii habaarka ahaa ee rabbisku yidhaahdeen halagu oofiyo Masiixiyiinta (C.D. 70).
3. Si la mida “Ciise waa Rabbi,” waxa laga yaabaa inay ahayd mid baabtiisa lagu fuliyo.

2:22-23 “Ku alla kii Wiilka inkiraa” Macallimiinta beenta ah ee Gonostigga ayaa sheegtay, inay Ilaah garanayaan, laakiinse waxa ay diidnaayeen Wiilka iyagoo Masiixa maqaamkiisa yareeyay (4:1-6; 5:11-12; Yooxanaa 5:23). Marka la fiirsado qoraalladdii Gonostiga ee qarnigii labaad C.D. iyo wixii Axdiga Cusub lagaga sheegay, waxa aan arkaynaa inay aaminsanaayeen:

1. Waxay isku dayayeen inay is dhex geliyaan falsafaddii Giriigga iyo Masiixiyadda (Plato) iyo sidoo kale diimihii bariga.
2. Waxa ay sheegeen inuu Ciise yahay Ilaah oonu ahayn aadane, maxaa yeelay waxay rumaysnaayeen maaddada iyo sharka, sidaasi darteedna waxa ay sheegeen in Ilaah aanu jidh soo qaadan karin.
3. Badbaadada waxay ka malaynaayeen labo waxyaalood:
 - a. kuwo iyaga ka mid ahi waxay rumaysnaayeen in garashada gaarka ahi ay keenayso badbaadada iyadoon la xidhiidhin ficillada jidhka
 - b. kuwo kalena waxay rumaysnaayeen dhowrsanaanta la taaban karo (Kolosay 2:20-23). Waxa ay rumaysnaayeen in diidmada waxa jidhku rabaa ay lagama maarmaan u tahay badbaadada.

2:23 aayaddani waxa ay ku sugantahay Textus Receptus (Qoraalka la Aqbali karo), iyadoo la socota qoraal gacmeedyada K iyo L, waxaanu soo gaabinayaa qoraalka asalka ah, isaga oo ka tegaya la sinnaanshaha labaad ee Aabbaha, kaasi oo si xooggan loogu taageeraya qoraal gacmeedyada Giriigga A, B, iyo C.

▣ **“kan qirta”** waxa middani ay kasoo horjeeddaa “kan inkira” sida ku sugan aayadda 22 [labo jeer] iyo 23 [mar qudha] iyo 26 [mar qudha]. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 9:22-23.

▣ **“Wiilka”** Ilaah oo weheshi lala yeeshaa waxa ay ku suurtoobaysaa oo keliya rumaysashada Wiilka (5:1-12, 13). Rumaysashada Ciise maaha ikhtiyaar, laakiinse isagu waa jidka keliya ee Aabbaha lagu heli karo (Yooxanaa 5:23; 14:6; Luukos 10:16).

2:24 “idinku” hadalkani waxa uu muujinayaa is barbar dhigga u dhexeeya akhristayaasha Yooxanaa iyo macallimiinta beenta ah iyo kuwa iyaga raacay isla markaana ka tegay is weheshiga Masiixiniimada (aayadda 27).

▣ **“waxaad tan iyo bilowgii maqlayseen ha idinku sii jiro”** waa ficil amar ah oo wakhti xaadirka jooga, naxwe ahaanna waxa uu adkaynaa “idinku” (oo ah cibaarada Giriiggu midda ay ku bilaabmayso) iyada oo kasoo horjeedda macallimiinta beenta ahi waxay sheeganayaan. Injiilka waxa halkan lagu muujinayaa isagoo ah sidii shakhsi ku negaanaya oo wax ku dhex jiraya, tanina waa sababta ugu horraysa ee rumaystayaashu kaga guulaysan karaan macallimiinta beenta ah (beenaalayaasha). Midda labaadana waxa weeyi sida aan ka arkayno aayadaha 20 iyo 27, halkaasoo lagu sheegay subkista Ruuxa. Markale ayaa waxaan dareemaynaa xidhiidhka ka dhexeeya Injiilka oo isugu jira farriin iyo shakhsi kuwaasoo ay isku xidhayso erayada “tan iyo bilowgii” (aayadaha 13, 14, 24 [labo jeer]). Erayga Ilaah waxa uu isugu jiraa shakhsi nool oo qoran isla markaana nool (1:8, 10; 2:20, 24)! Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:10.

▣ **“haddii”** waa weedh shuruudeed heerka saddexaad ah isla markaasna faa’idaynasa wax dhicitaankiisu suurto gal yahay. Aayaddani waxa ay sii xidhiidhinaysaa arrinta la xidhiidha “dhex jirista,” ku dhex jiris la’aantu waxay muujinaysaa inaanu qofku ahayn rumayste run ah (2:18-19). Qaab nololeedku wuxuu soo jiitaa “ku dhex jirista” isagoo keenaya damaanad qaadka iyo yaqiinta (Yooxanaa 15). Ku sugnaanshuhu waa farriin la maqlay oo la aqbalay, iyadoo markaasna si joogto ah xidhiidh loola yeelanayo Wiilka iyo Aabbaha (Yooxanaa 14:23), waxaanay ka muuqanaysaa nolosha ku dhisan hubaasha (jacaylka) iyo diidmada (diidmada dunida).

2:25 “Oo kanu waa ballankii uu inoogu ballan qaaday oo ah nolosha weligeed ah” magac u yaallada lagu adeegsaday aayadda 25 waxa ay yihiin kuwo dhinac ka qarsoon, marka loo eego ujeedadooda, waxaana laga yaabaa inay tilmaamayaan Ilaaha Aabbaha ah ama Wiilka. Waxa laga yaabaa in middani ay kas tahay (sida 2 Butros 1). Waxa isu eeg aayaddan iyo Yooxanaa 3:15-16 iyo 6:40. Rajada rumaystuhu waxay ku dhisantahay shakhsiyadda Ilaah iyo ballan qaadyadiisa (Ishacyaah 45:23; 55:11), iyadoo xidhiidhka aan la leenahay Ilaah

NASB (UPDATED) TEXT: 2:26-27

²⁶Waxaan idiin soo qoray waxyaalahan ku saabsan kuwa idin khiyaanaynaya. ²⁷Subkidda aad ka hesheen isaga way idinku sii jirtaa; oo uma baahnidin in cidina wax idin barto; laakiin sida subkiddiisu wax walba idiin barto, oo ay run u tahay, beenna aanay u ahayn, waa inaad siday wax idiin bartay ugu sii jirtaan.

Saddexmidnimada isku muujiyayna, ay tahay midda ay ku jirto rajada iyo ballan qaadka nolosha weligeed ahi (5:13). Nolosha weligeed ahi waxa ay leedahay dabeecad loo fiirsan karo.

2:26 “kuwa idin khiyaanaynaya” waa magaca fal sameeyaha ku dhisan garashada ee wakhti xaadirka jooga. Khayaanoolayaashu casri walba waa ay joogaan (Matayos 7:15; 24:11, 24; 2 Yooxanaa 7). Hadiyo goorna waxa ay kuwani ka yimaaddaan kuwa sheegta inay diin leeyihiin.

2:27 “Subkidda” waxay u muuqataa aayaddani inay adkaynaso natiijada subkista, oonay ahayn siday ku imanayso (Ruuxa) ama waxyaalo kale (injiilka). Ujeedada subkista ee Axdiga Hore waxay ahyad dadka oo muhiimad gaar ah loo diyaariyo sida nebiyada, wadaaddada, boqorrada. Waxa muuqatana in eraygani uu la xidhiidho “Masiixa.” aayaddani waxay sheegaysaa sugnaanta natiijada ka dhalanaysa iftiiminta Ruuxa Quduuska ah ee ifinaysa qalbiga rumaystaha. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Yooxanaa 11:2.

Macallimiinta beenta ah ayaa sheegta inay Ilaah ka helaana muujin gaar ah, halka Yooxanaa isna uu ka sheegayo subkista runta ahi inay u ahaatay dhammaanba rumaystayaasha isku halleeya kan wax subka, iyagoo Ruuxu uu ka buuxsamo isla markaasna uu ku sugnaado erayga Ilaah.

▣ **“aad ka hesheen”** falka tegay ee ku dhisan garashadu waxa uu tusinayaa shaqo la dhammays tiray wakhti tegay. “subkistu” waxa ay la simantahay erayga “maqasheen” sida ku sugan aayadda 24. Waxa lagama maarmaan ah in Injiilka (1) shakhsi ahaan loo aqballo (Yooxanaa 1:12; 3:16) iyo (2) xaqiiqo ahaan (2 Yooxanaa 9-10; 1 Korintos 15:1-4; Yuudas 3). Ruuxa Quduuska ahina labada xaqiiqaba wuu ka dhabeeyaa.

▣ **“oo uma baahnidin in cidina wax idin barto”** aayadda 27 waxa ay la mid tahay aayadda 20 (Axdiga Cusub, Yeremyaah 31:34). Yooxanaa waxa uu adeegsanayaa mawduucyo soo noqnoqonaya (aayadaha 20, 24, 27). Ruuxa Quduuska ah, oon ahayn macallimiinta Gonostiga ee beenta ah ayaa ah macallinkeena (Yooxanaa 14:26). Tan loogalama jeedo in mansabka macallinku uu meesha ka maqnaa kaniisaddii hore iyo tan maantaba iyadoo laga maarmayo (Efesos 4:11; Falimaha Rasuullada 13:1; 2 Korintos 12:28), laakiin arriamaha khuseeya badbaadadu waxay gaar u yihiin Ruuxa Quduuska ah iyo Kitaabka, mana aha kuwo ay shaqo ku leeyihiin macallimiin kale oo aadanaha ahi.

▣ **“laakiin sida subkiddiisu wax walba idiin barto, oo ay run u tahay, beenna aanay u ahayn”** weedhani waxay tilmaamaysaa ruuxa xaq ah, Masiixi kastaana waxa uu haystaa Ruuxa Quduuska ah oo hagaya. Waa in aan dareen ka yeelano hoggaaminta uu Ruuxu inaga ina hagayo.

▣ **“waa inaad siday wax idiin bartay ugu sii jirtaan”** waa fal amar ah oo ku dhisan garasho tusmayna wada. Yooxanaa waxa uu adeegsanayaa fahanka “ku dhexjirista” in badana waxa ay ka muuqanaysaa qoraalkiisa (Yooxanaa 15). Rumaysadka kitaabiga ahi waa axdi uu Ilaah qorshayaasha ku dejiyo, laakiinse inagana waxa la inaga rabaa inaan ka jawaab celino oo ku socono ku dhexjiritaan. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 2:10.

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Tilmaan ka bixi caqiidooyinka macallimiinta been ahaa?
2. Maxaa caddayn u ah in si runa aan u badbaadnay?
3. Sharax xidhiidhka u dhexeeya denbiga caadi ahaan la galo falalka khaldan ee soocan?
4. Sharrax xidhiidhka u dhexeeya dadaalka rumaystaha iyo damaanad qaadka rumaysadkiisa.
5. Tiri oo qeex cadowyada saddexda ah ee aadanaha.

I YOOXANAA 2:28-3:24

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Carruur Ilaah (2:28-3:10)	Carruurta Ilaah	U hoggaansanaanta rumaysadka runta ah (2:18-29)	Cadowga Masiixa (2:18-29)	U noolaanshada sida carruurta Ilaah (2:29-4:6)
2:28-3:3	2:28-3:3	2:28 2:29	2:28-29	2:29-3:2
		Xidhiidhka lagu ka muuqda dabeecadda 3:1-10	Carruur Ilaah 3:1-3	Ugu horrayn: ka go'ista denbiga 3:3-10
	Denbiga iyo carruurta Ilaah			
3:4-10	3:4-9		3:4-6 3:7-8 3:9-10	
	Amristaanka jacaylka 3:10-15			
Is jeclaada		Midwaliba ka kale ha jeclaado	Is jeclaada	Marka labaad: dhowrista amarada gaar ahaan nolosha 3:11-24
3:11-18		3:11-18	3:11-12 3:13-18	
	Ku shaqaynta jacaylka 3:16-23			
Ku kalsoonaanta Ilaah		Masiixiyiinta waxa loo ballan qaaday 3:19-24	Dhiirranaanta lagu helo Ilaah hortiisa 3:19-24	
3:19-24				
	Ruuxa runta iyo ruuxa khaladka 3:24-4:6			

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEDEEDA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan

dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

NASB (UPDATED) TEXT: 2:28-3:3

²⁸Oo imminka, Carruurtiyey, ku sii jira isaga; in kolkuu muuqdo aynu kalsoonaan doonno oo aynaan wakhtiga imaatinkiisa ka xishoonin inaynu hor tagno. ²⁹Haddaad og tihiin inuu xaq yahay, waxaad weliba ogaataan in mid walba oo xaqnimo falaa uu isaga ka dhashay. Bal ogaada siduu yahay jacaylka Aabbuhu ina siiyey, taasoo ah in laynoogu yeedho carruurta Ilaah, oo saasaynu nahay. Sidaa aawadeed duniidu ina garan mayso, maxaa yeelay, isagaba ma ay garanaynin. **2** Gacaliyayaalow, imminka waxaynu nahay carruurta Ilaah; oo weli waxaynu noqon doonno lama muujin, laakiin waxaynu og nahay in goortuu muuqdo aynu noqon doonno sidiisa oo kale, waayo, waynu arki doonnaa isaga siduu yahay. ³⁰Oo mid kasta oo waxyaalahaas ka rajeeyaa isaga, naftiisuu daahiriya siduu isaguba daahir u yahay.

FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Cutubka labaad waxa uu ku waajahan yahay macallimiintii Gnostiga ee beenta ahaa, gaar ahaan kuwii diiddanaa dadnimada Ciise.
- B. Cutubka saddexaad waxa uu sii wadaa tilaamista macallimiinta beenta ah ee kala saaray badbaadada iyo akhlaaqda, sidoo kalena waxa uu si toosa uula hadlayaa rumaystayaasha.

2:28 mufasiriintu iskuma waafaqsana haddii qaybtani ay ka bilaabmayso aayadaha 28, 29, ama 3:1, laakiin waxa loo badanayaa inay ka bilaabmayso halkan sababtuna waa iyadoo lagusoo celcelinayo aayadaha 27 iyo 28.

▣ **“Carruurtiyey”** eeg fiirada 2:1.

▣ **“ku sii jira isaga”** waa fal amar ah oo wakhti xaadirka jooga kuna dhisan garasho, waxaanu rumaystayaasha ku boorinayaa kusii socoshada rumaysadka (aayadaha 15, 24). Eeg Mawduucyada Gaarka ah ee Yooxanaa 8:31 iyo 2:10.

Magac u yaallada waxa adag garashadooda, laakiin sadarkan, waxa ka muuqda

1. “Isaga dhexdiisa,” aayadaha 28a- Ciise
2. “ka ahaaday Isaga,” aayadda 28b – Ciise
3. “kiisa” aayadda 28b – Ciise
4. “Isagu waa xaq” aayadda 29 – Aabbaha
5. “isaga ka dhashay” aayadda 29 – Aabbaha
6. “garanaya Isaga” 3:1 – Aabbaha (Yooxanaa 15:21; 16:2-3)
7. “wuu u muuqdaa” 3:2 – Ciise
8. “sidiisa oo kale” 3:2 – Ciise
9. “arka isaga” 3:2 – Ciise
10. “Isagu” 3:2 – Ciise

11. “isaga korkiisa” 3:3 – Ciise
 12. “sida uu u yahay quduuska” 3:3 – Ciise
- Macnaha, macnaha, macnaha!

▣ **“kolkuu muuqdo”** waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah, sida aayadda 29, iyo sidoo kale “marka Ciise uu soo laabto” 3:2. Tani ma tilmaamayso dhacdo aan la hubin dhicitaankeeda, laakiin waxa ay tusinaysaa wakhtiga ay dhici doonto (sida Axdiga Cusubi u adeegsanayo erayga “rajo” 3:3).

▣ **“aynu kalsoonaan doonno”** Erayga Giriigga ah ee “kalsooni” (*parrhēsia*) waxa asalkiisu yahay “u hadlista si kalsooni leh.” yaqiinsashadu waa qaab nololeed ku salaysan aqoonta rumaystaha iyo ku kasloonaanshaha injiilka Ciise Masiix.

Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 7:4.

▣

NASB “ka xishoonin inaynu hor tagno”
NKJV “aynaan ka xishoonin hor tegistiisa”
NRSV “aynaan noqonin kuwo ka xishooda hortiisa”
TEV “aynaan hortiisa xishood ugaga dhuuman”
NJB “ka xishooshinin inaynu isaga hortagno”

Waa fal tegay kaasi oo loo fahmi karo

1. In rumaystaha laftiisu uu noqdo mid xishooda (NASB, TEV, NJB)
2. Rumaystaha oo laga xishoodsiiyo (NRSV).

Rumaystayaasha waxa ay ku farxayaan Imaatinka Masiixa, laakiinse kuwa kale ee ku noolaa xaasidnimada waxa ay ku noqon doontaa kedis marka uu yimaaddo! Waxa iman doono xukunka rumaystayaasha (2 Korintos 5:10).

▣ **“imaatinkiisa”** waxa ay tilmaamaysaa Imaatinka Labaad ee Masiixa. eraygan ah *parousia*, waxa lagu adeegsaday halkan oo keliya qoraallada Yooxanaa, waxaanay la xidhiidha imaatin boqortooyo oo dhow. Macno ahaan waxa weeyi “ilaa *parousia*” oo loogala jeedo “joogitaan” waxaana loo adeegsaday booqashada boqortooyada. Axdiga Cusubi waxa uu adeegsanayaa erayo kale oo lagu tilmaamayo Imaatinka Labaad ee Masiixa waana

1. *epiphaneia*, “muuqasho fool ka fool ah”
2. *apokalupis*, “aan dednayn”
3. “Maalinta Rabbiga” kuwa u dhigma.

MAWDUUC GAAR AH: ERAYADA AXDIGA CUSUB EE LOO ADEEGSADAY SOO LAABASHADA MASIIXA

Rasuul Bawlos iyo qorayaasha Axdiga Cusub ayaa erayo dhowra ku tilmaamya maalintaa gaarka ah ee Masiixu iman doono isaga dunida xukumi doona

1. “Maalinta Rabbigeena Ciise Masiixa” (1 Korintos 1:8)
2. “maalintaa Rabbiga” (1 Korintos 5:5; 1 Tesaloniika 5:2; 2 Tesaloniika 2:2)
3. “Maalinta Rabbi Ciise” (1 Korintos 5:5; 2 Korintos 1:14)
4. “Maalinta Ciise Masiix” (Filiboy 1:6)
5. “Maalinta Masiixa” (Filiboy 1:10; 2:16)
6. “Maalintiisa (Wiilka Aadanaha)” (Luukos 17:24)
7. “Maalinta Wiilka Aadanu muuqan doono” (Luukos 17:30)
8. “Muuqashada Rabbigeena Ciise Masiix” (1 Korintos 1:7)
9. “Marka Rabbi Ciise uu kasoo muuqan doono samada” (2 Tesaloniika 1:7)
10. “Joogitaanka Rabbi Ciise iyo imaatinkiisa” (1 Tesaloniika 2:19)

Qorayaasha Axdiga Cusubi soo laabashada Ciise ugu yaraan waxay ku sheegayaa ilaa afar odhaahood:

1. *epiphaneia*, oo tilmaamaysa iftiimin la yaableh oo la xidhiidha fiqiga oon ahayn xagga luqada, waana erayga “ammaan.” Sida ka muuqata 2 Timoteyos 1:10; Tiitos 2:11 iyo 3:4 waxa ay tilmaamaysaa

imaatinka hore ee Ciise (jidh soo qaadashada) iyo Imaatinkiisa Labaad. Waxa lagu adeegsaday 2 Tesaloniika 4:8, iyada oo koobsanaysa saddexda eray ee ugu muhiimsan sheegayana Imaatinka Labaad: 1 Timoteyos 6:14; 2 Timoteyos 4:4:1,8; Tiitos 2:13.

2. *parousia*, eraygani asal ahaan waxa uu sheegayaa booqasho boqortooyo, waana erayada ugu badan ee Imaatinka Ciise ee labaad loogu adeegsaday Axdiga Cusub (Matayos 24:3,27,37,39; 1 Korintos 15:23; 1 Tesaloniika 2:19; 3:13; 4:15; 5:23; 2 Tesaloniika 2:1,8; Yacquub 5:7,8; 2 Butros 1:6; 3:4,12; 1 Yooxanaa 2:28).
3. *apokalupsis* (ama *apocalypsis*), waxaanay tilmaamaysaa daah ka qadista iyadoo wax la muujinayo, waana magac kale oo Axdiga Cusub lagu dhex adeegsado (Luukos 17:30; 1 Korintos 1:7; 2 Tesaloniika 1:7; 1 Butros 1:7; 4:13).
4. *phaneroo*, waxaanay tusinaysaa iftiimin ama iyadoo si toos ah wax loo muujiyo, waxaana Axdiga Cusub loogu adeegsaday iyada oo tusinaysa muujinta Ilaah. waxa ay la mid tahay *epiphaneia*, iyadoo tilmaamaysa Imaatinkii hore ee Ciise (1 Butros 1:20; 1 Yooxanaa 1:2; 3:5,8; 4:9) iyo Imaatinka Labaad (Matayos 24:30; Kolosay 3:4; 1 Butros 5:4; 1 Yooxanaa 2:28; 3:2).
5. Erayga ugu badan yahay adeegsigiisu waa *erchomai* waxaana loo adeegsaday imaatinka Masiixa (Matayos 16:27-28; 23:39; 24:30; 25:31; Falimaha Rasuullada 1:10-11; 1 Korintos 11:26; Muujintii 1:7,8).
6. Sidoo kala waxa lala adeegsaday “Maalinta Rabbiga” (1 Tesalonika 5:2), kaasi oo Axdiga Hore dhexdiisa ku ah magac Ilaah ee maalintaa barakadaynta iyo qiyaamaha. Axdiga Cusub waxa lala qoray aragtida Axdiga Hore, kaasi oo sheegay
 - a. Joogitaanka wakhti shar iyo caasinnimo leh
 - b. Imaatinka casriga xaqnimada
 - c. Imaatinka casriga ku saabsan adeegista Ruuxa oo ku imanaya shaqada Masiixa

Arrinta fiqi ahaaneed ee muujintu waa arrin loo baahan yahay, maxaa yeelay qorayaasha Axdiga Cusubi xoogaa waxay wax ka beddeleen waxyaalihii Israa’iil ay filayeen. Halkii uu ka iman lahaa Masiixa oo boqor taliye ah ahi, waxa uu yimid oo ay arkeen Ciisihii reer Naasereet oo Ilaah isaga isku dhex muujiyaya isaga oo ah adeege silcaya Ishacyaah 53, iyo isaga oo sidoo kale fuulay dameer Sekaryaah 9:9. Masiixu imaatinkiisa hore waxa uu ku bilaabay wakhti boqortooyada Ilaah uu dhulka keenay iyada oo markaasna joogta, laakiinse aan weli dhammays tirmin. Arrintani waxa ay ahayd mid fikirka Yuhuudda ku jirtay. Labada imaatinka waxa weeyi lagama maarmaan iyada oo Ilaah uu dadka oo dhan u faa’idaynayay (Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5 iyo nebiyadii gaar ahaan Ishacyaah iyo Yoonis).

Kaniisaddu sugi mayso dhammays tirka waxsii sheegistii Axdiga Hore maxaa yeelay badanaa waxsii sheegyadaasi waxay la xidhiidheen Imaatinkii koobaad ee Masiixa (How to Read the Bible For All Its Worth, pp. 165-166). Waxa rumaystayaasha filayaani waa waa imaatinka boqorka la sarakiciyay ee ah Rabbiga rabbiyada, waana dhammaystirka buuxa ee casriga cusub oo iman doona dhulka (Matayos 6:10). Arrinta uu muujinayo Axdiga Hore maaha hubaal la’aan laakiinse waa wax aan dhammays tirmin. Ciise waxa uu mar labaad kusoo laaban doonaa awood sidii ay nebiyaduba hore usii sheegeen oo kale.

Imaatinka Labaad maaha kitaabi, laakiinse fahankiisu waxa uu ka muuqdaa Axdiga Cusub. Imaatinka Labaad ee Ciise ayaa Ilaah uu kusoo celin doonaa ekaanshihiisa ku sugan aadanaha, waxaanu xukumi doonaa oo meesha ka saari doonaa sharka. Ilaah ujeedadiisu maaha mid guul darraysan doonta marnaba.

2:29 “haddii” waa weedh shuruudeed heerka saddexaad ah isla markaana faa’idaynasa suurta galnimada dhicitaanka. Halkan waxa ay ku tilmaamaysaa garashada ay rumaystayaashu wadaagaan, laakiinse aanay haysanin macallimiinta beenta ahi.

▣ **“ogaataan”** waa fal wakhti xaadirka jooga oo ku dhisan garasho isla markaasna tilmaamaya garasho soconaysaa, amaba waa fal fal wakhti xaadirka jooga oo tilmaamaya garashada lagama maarmaanka u ah rumaystaha.

▣ **“Isaga”** aayadaha 28; 2:1; iyo 3:7 ayaa sheegaya in magac u yaalkani tilmaamayo Ciise, laakiin magac u yaalka ah “isaga ka dhashay” waxa uu tilmaamayaa Ilaaha Aabbaha ah, maxaa yeelay erayada ah “ka dhashay Ilaah” ayaa badanaa la adeegsaday (3:9; 4:7; 5:1, 4, 18; Yooxanaa 1:13).

▣ “xaq..xaqnimo” waa sifo ka mida sifooyinka qoyska Ilaah!

MAWDUUC GAAR AH: XAQNIMADA

‘Xaqnimadu’ waa mawduuca muhiim u ah ardayga Baybalka baranaya waxaana loo baahan yahay in daraasad shakhsi ahaaneed oo dheeraada qofku uu ku sameeyo mawduucan.

Marka aan eegno Axdiga Hore waxa la tilmaamay ‘cadaalad’ amma ‘xaqnimo’ (BDB 841). Haddaba, Ilaah eraygan waxa uu u adeegsaday inuu ku muujiyo dabiicaddiisa, waayo isagu waa xaakinka caadilka ah ee wax walba qiimeeya. Arrintan haddaba khusaysa xaqnimada Ilaah waxa ay tusinasaa inuu yahay kan sameeya xukunka saxda ah.

Aadanaha waxa laga abuuray ekaanshaha Ilaah (Bilowgii 1:26-27; 5:1,3; 9:6). Sidii kale waxa aadanaha loo abuuray inay Ilaah la yeeshaan xidhiidh oo la joogaan. Ilaah waxa uu abuuray waxa ugu wayn aadanaha, sidaasi darteedna waxa uu damcay, in iyagu ay Isaga aqoonsadaan, u adeegaan oo jeclaadaan Isaga! Haddaba, waa la tijaabiyay aadanaha bal sida addeecitaankoodu yahay (Bilowgii 3) iyadoo Aadan iyo Xaawana ay ku dhaceen tijaabadaas. Arrintani haddaba waxa ay keentay kala go’itaan ku yimaadda xidhiidhkii u dhexeeyay Ilaah iyo aadanaha (Bilowgii 3; Rooma 5:12-21).

Ilaah haddaba waxa uu ballan qaaday inuu xidhiidhkaas dib usoo nooleeyo (Bilowgii 3:15). Waxaanu sidan ku samaynayaa doonistiisa iyo Isaga oo adeegsanaya Wiilkiisa. Waayo aadanuhu may awoodayn in arrintaas dib u hagaajiyaan (Rooma 1:18-3:20).

Markii aadanuhu danbaabeen, tallaabadii ugu horraysay ee Ilaah qaado isaga oo raba inuu xidhiidhkaas dib u nooleeyo ayaa waxa ay ahayd inuu axdi la dhigto aadanaha, isaga oo markaasna raba inay towbad keenaan oo addeecaan Ilaah. laakiinse way awoodi kari waayeen inay qabtaan wixii laga rabay (Rooma 3:21-31; Galatiya 3). Haddaba, Ilaah waxa uu horeba u lahaa qorshe uu dib ugu soo hagaajinayo axdigii ay jebiyeen aadanuhu, waxaanu arrintaas ku sameeyay sidan:

1. Muujinta aadanaha denbiga miidhan ah oo xaqnimadooda lagu muujiyay shaqadii Masiixa.
2. In si xorriyad leh aadanaha xaqnimo loogu siiyay shaqada Masiixa aawadeed.
3. In lasiiyay Ruuxa keenaya xaqnimada (la midnimada Masiixa, soo celinta muuqaalka Ilaah ee ku sugan aadanaha)

Si kastaba ha ahaatee, Ilaah waxa uu rabaa jawaab ku dhisan axdi. Ilaah Isaga ayaa wax walba xukuma oo aadanahana quudiyay, laakiinse aadanahuna waa inay arrintaas ka jawaaba celiyaan oo jawaabtoodana si joogta ah u wadaan.

1. Towbad keen
2. Rumaysad
2. Nolosha oo uu ku dheehnaado addeecitaan
3. Qirasho

Xaqnimada haddaba, waa axdiga isku xidhaya ee u dhexeeya Ilaah iyo wuxuu abuuray kuwan ugu sarreeya oo ah aadanaha. Waxa lagu saleeyay dabeecadda Ilaah iyo shaqadii Masiixa iyo Ruuxa oo inoo suurto gelinay inaan samayno xaqnimada, waana in qof waliba shakhsi ahaan uu sida ugu habboon uga jawaaba celiyo. Aragtida lagu magacaabo ‘xaqnimada iyo rumaysad.’ Waa aragti lagu dhex muujiyay Injiillada, mana aha mid shuruudahan oo kale wadata, laakiinse waxa qeexay Bawlos, oo erayga xaqnimada macnayaashiisa kala gedisan isticmaalaya in kabadan 100 jeer.

Bawlos wuxuu adeegsanayaa eraygan *dikaiosunē* oo asal ahaantiisa waxa uu kasoo dhegtay macnaha ay ka samaynaso luqadda Cibraaniyada *SDQ* oo ah mid lagu dhex adeegsaday Septuagint ga, oo kama aanu keenin qoraallada Giriigta. Xagga Giriigta marka laga eero eraygani wuxuu la xidhiidhaa qof addeeca waxyaabaha la xidhiidha ilaahnimada iyo bulshada. Laakiinse xagga Cibraaniga waxa had iyo jeer ay ka tarjumaysaa axdi. Ilaah waa cadaali, oo waxa uu rabaa in dadkiisu ay ka tarjumaan oo muujiyaan dabeecaddiisa. Haddaba, aadanahan denbiga la daahiriyeey ayaa waxa ay noqonayaan abuur cusub. Noloshan cusboonaanta ah waxa ka imanaya nolol wanaagsan oo ku dheehan cibaado (Roman Katoliguna waa waa sida ay xaqnimada u arkaan). Haddaba, maadaama oo Israa’iil iyagu gaar isu arkayeen may jirin siyaabo lagu kala saaro dadka caadiga iyo kuwo qudiisiinta ah isla markaasna ku socda doonista Ilaah. Eraygan lagu dhex adeegsaday Cibraaniyada iyo Giriiggaba waxa loo tarjumay luqada Ingiriisida “xaq” (iyadoo la xidhiidha

bulshada) iyo “xaqnimo” (oo la xidhiidha diinta).

Injiilka amaba warka wanaagsan ee Ciise Masiix ayaa waxa uu yahay, in aadanahaas denbaabay dib loogu cafiyay si ay Ilaah ula yeeshaan xidhiidh. Arrintan waxa lagu fuliyay jacaylka Aabbaha, naxariista, nimcada; nolosha Wiilka, dhimashadiisa, iyo sara kicistiisa; iyo Ruuxa inoo muujinaya warka wanaagsan. Xaqnimadu waa hadiyad Ilaah bixiyo, laakiin waa inay ku dheehnaato cibaado (Augustine heerka uu ka taagnaa xaqnimadu wuxuu ahaa xoojinta xornimada injiilka, halka Rooman Katoligu ka xoojinayaan beddelitaanka nolosha ku dhisan jacaylka iyo rumaysadka). Marka aan eegno mad-habka Reform (Dib u hagaajin) ‘xaqnimada Ilaah’ waxa weeyi in denbiga aadanahu uu yahay mid Ilaah aqbali karo, laakiin Catholic amaba Kaatoliga, waxa weeyi in qofku uu quduus iska dhigo oo marwalba Ilaah oo kale isu ekaysiiya. Haddaba, xaqiiqada marka la eego labadaba waa ay tahay!

Aniga fahankayga aan ka qabo Kitaabka Quduuska ah, laga bilaabo Bilowgii ilaa Muujintii waxa uu yahay dib usoo hagaajinta xidhiidhkii Ilaah ee beer Ceeden. Baybalku waxa uu ku bilaabmayaa xidhiidhkii ka dhexeeyay Ilaah iyo aadanaha markii dhulka la abuuray (Bilowgii 1-2) waxaanu ku dhammaanayaa aragtidaas mid lamida (Muujintii 21-22). Muuqaalka Ilaah iyo ujeedadiisuba waxa ay noqon doonaan kuwo dib loo hagaajiyo!

Aniga aragtidayda gebi ahaanba ku waajahan Baybalku marka laga bilaabo Bilowgii 4 ilaa Muujintii 20, waxa weeyi Ilaah oo dib u hagaajin ugu samaynaya xidhiidhkii Beer Ceeden. Baybalku wuxuu ku bilaabmayaa Ilaah iyo aadanaha oo xidhiidh wada lahaa (Bilowgii 1-2) waxaanu ku dhammaanayaa isla arrintaas (Muujintii 21-22). Ilaah ekaanshihiisa uu ka sameeyay aadanaha iyo ujeeddadiisuba waxay noqon doonaan kuwo dib loo hagaajiyo!

Si baadhitaan aad ugu samayso falaqayntan aan kor kusoo xusnay u fiirso aayadahan aan kasoo xulnay Axdiga Cusub:

1. Ilaah waa mid xaqnimo leh (waxa ay la xidhiidhaa Ilaah oo ah Xaakin)
 - a. Rooma 3:26
 - b. 2 Tesaloniika 1:5-6
 - c. 2 Timoteyos 4:8
 - d. Muujintii 16:5
2. Ciise wuxuu leeyahay xaqnimo
 - a. Falimaha Rasuullada 3:14; 7:52; 22:14
 - b. Matayos 27:19
 - c. 1 Yooxanaa 2:1,29; 3:7
3. Ilaah wuxuu abuuray xaqnimo ayuu la doonayaa
 - a. Laawiyiintii 19:2
 - b. Matayos 5:48 (Rooma 5:17-20)
4. Ilaah waxa uu rabaa inuu bixiyo oo dib usoo nooleeyo xaqnimada
 - a. Rooma 3:21-31
 - b. Rooma 4
 - c. Rooma 5:6-11
 - d. Galatiya 3:6-14
 - e. Waxa bixiya Ilaah
 - 1) Rooma 3:24; 6:23
 - 2) 1Korintos 1:30
 - 3) Efesos 2:8-9
 - f. Waxa lagu helaa rumaysad
 - 1) Rooma 1:17; 3:22,26; 4:3,5,13 9:30; 10:4,6,10
 - 2) 1 Korintos 5:21
 - g. Waxa lagu helayaa waxqabadkii Wiilka
 - 1) Rooma 5:21-31
 - 2) 2 Korintos 5:21
 - 3) Filiboy 2:6-11
5. Doonista Ilaah waa in kuwa isaga raacaa ay xaqnimo lahaadaan

- a. Matayos 5:3-48; 7:24-27
- b. Rooma 2:13; 5:1-5; 6:1-23
- c. 1 Timoteyos 6:11
- d. 2 Timoteyos 2:22; 3:16
- e. 1 Yooxanaa 3:7
- f. 1 Butros 2:24

6. Ilaah dunida waxa uu ku kala xukumi doonaa xaqnimadooda

- a. Faliimaha Rasuullada 17:31
- b. 2 Timoteyos 4:8

xaqnimada waa dabeecadda Ilaah, oo aadanaha denbaabayna waxa lagu siiyay Ciise Masiix aawadiis:

- 1. Waa xukunka Ilaah
- 2. Waa hadiyadda Ilaah
- 3. Waa shaqadii Masiixa

Laakiin sidoo kale in xaqnimada la yeesho waxa loo mara jid, oo maalin maalmaha ka mida ayaa la dhammays tiri doonaa, waana marka labaad ee Masiixu soo laabto.

Kuwani waa waxyaalo lagasoo qaatay *Dictionary of Paul and His Letters* (Qaamuuska Bawlas iyo Waraaqihiisii)

“Calvin, wuxuu si ka badan Luther, u sheegayaa xidhiidhka saamaynta ah ee xaqnimada Ilaah. Luther aragtida uu ka qabo xaqnimada Ilaah ayaa waxa ay tahay dhinaca xorriyadda iyo xukun la'aanta. Calvin ayaa isna waxa uu sheegayaa dabeecadda cajiibka leh ee wada xidhiidhka ku dhisan xaqnimada Ilaah ina siiyay” (p. 834).

Aniga aragtidayda, xidhiidhka Ilaah la leeyahay Masiixiyiinta waxa uu taabanayaa saddex dhinac:

- 1. Injiilku waa shakhsi (Kaniisadda Bari iyo fahanka Calvin).
- 2. Injiilku waa runta (fahanka Augustine iyo Luther).
- 3. Injiilku waa bedelitaanka nolosha (fahanka Kaatoliga).

Dhammaantood waa run waxaana waajib ah in la isku qabto si loo helo Masiixiyad ku dhisan Kitaabka Quduuska ah.

Waa inaan soo dhowayno Ciise!

Waa inaan rumaysano injiilka!

Waa inaan ku davano tusaalaha Masiixa!

MAWDUUC GAAR AH: CADAYMAHA AXDIGA CUSUB EE BADBAADADA QOFKA

Waxa lagu saleeyay Axdiga Cusub (Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:22-38) Ciise dhexdiisa:

- 1. Dabeecadda Aabaha (Yooxanaa 3:16), shaqada Wiilka (2 Korintos 5:21), iyo shaqada Ruuxa (Rooma 8:14-16) kumanay imanin wanaagga iyo shaqada aadanaha amaba addeecitaanka.
- 2. Waa hadiyad (Rooma 3:24; 6:23; Efesos 2:5,8-9).
- 3. Waa nolosha Cusub, aragti cusub (Yacquub iyo 1 Yooxanaa).
- 4. Waa ogaansho (injiilka), xidhiidh la yeelasho (rumaysad iyo isku hallaynta Masiixa), iyo qaab nololeed cusub (ku dayashada Masiixa) waa saddexdan dhammaantood, oo midini keligii taagna maayo.
- 5. Eeg tijaabooyinka badbaadada runta ah ee Fahanka Macnaha Guud 1 Yooxanaa 2:3-3:3, C.

▣ **“dhashay”** waa fal ebyan oo ku dhisan garasho la'aan isla markaan tusmaynaya dhacdo ku timid adeeg dibadaad oo ah Ilaah (Yooxanaa 3:3). Fiiro u yeelo adeegsiga tusaalaha kale (3:9) si loo tusmeeyo qoyska Masiixiyadda. Eeg fiirada 3:1d.

3:1 “Bal ogaada siduu yahay jacaylka” Yooxanaa kitaabkiisa waxa uu ku adeegsanayaa *agapaō* (fal) ama *agapē* (Magac, 2:5, 15; 3:1, 16, 17; 4:7, 8, 9, 10, 12, 16, 17, 18; 5:3). Eraygan laguma adeegsanin luqadii Giriigga ee qadiimiga ahayd, waxaanay u muuqataa in kaniisaddii hore ay eraygan macnihiisa kusoos salaysay iftiinka Injiilka iyadoo loogala jeedo jacaylka sugan ee qotada dheer. Eraygan waxa Injiilka Yooxanaa loogu

adeegsaday iyada oo la mid ah *phileō* (5:20; 11:3, 36; 12:25; 15:19; 16:27; 20:2; 21:15, 16, 17). Waxaana xiiso leh iyada oo hadiyo goor 1 Yooxanaa loogu adeegsanayo jacaylka ka dhexeeya rumaystayaasha. Rumaysadkeenna aan Ciise rumaysanaa waxa uu bedelayaa xidhiidhka aan la leenahay iyo Ilaah iyo dadka labadaba.

▣ **“Aabbuhu ina siiyey”** waa fal ebyan oo tusmayn sida. Adeegsiga wakhtigani waxa uu la xidhiidhaa hadiyadda badbaadada ah ee Ilaah inagu siiyay Masiixa, waana waxa aasaaska u ah caqiidada damaanad qaadka ee rumaystaha (Yooxanaa 6:35-40; 10:1ff; Efesos 2:5, 8; 3:14; 5:1). Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 6:37.

▣ **“in laynoogu yeedho”** waa fal tegay oo tusinaya magac sharfeed ah (“carruurta Ilaah”) oo Ilaah bixiyay.

▣ **“carruurta Ilaah”** tani waa dulucda aayadaha 2:29-3:10. Waxa ay adkaynasaa Ilaah oo ugu horraynba keenay badbaadadeenna Yooxanaa 6:44, 65 . Yooxanaa waxa uu adeegsanayaa erayada qoyska loo adeegsado isaga oo tusinaya xidhiidhka rumaystayaasha la leeyihiin Ilaah (2:29; 3:1, 2, 9, 10; Yooxanaa 1:12).

Waxa xiiso leh iyada oo Yooxanaa (Yooxanaa 3:3) iyo Butros (1 Butros 1:3, 23) ay adeegsanayaan tusaalayaal qayska ah sida “dhasha markale” ama “kor ka dhashay” halka Bawlosna uu ka adeegsanayo “korsashada” (Rooma 8:15, 23; 9:4; Galatiya 4:15; Efesos 1:5), iyo Yacquub oo isna adeegsanaya tusaalaha “dhalashada” (Yacquub 1:18) isaga oo markaasna tilmaamaya xidhiidhka cusub ee ka dhexeeya Ilaah iyo rumaystaha kaasi oo ku yimid shaqadii Masiixa. Masiixiyadduna waa qays.

▣ **“oo saasaynu nahay”** erayadani maaha kuwo ku qoran King James Version ka maxaa yeelay kuma jiraan qoraal gacmeedyadii danbe ee Giriigga (K iyo L) kuwaasi oo KJV uu ku salaysan yahay. Si kastaba ha ahaatee, waxa ay ka muuqanaysaa badanaa qoraal gacmeedyada Giriigga (P⁴⁷, 8, A, B, iyo C). UBS⁴ kuna waxa uu ku dhigayaa “A” isagoo ku tiranaya (hubaal). Eeg Lifaaqa Labaad ee Dhaleecaynta Qoraallada.

▣ **“dunidu ina garan mayso”** erayga “duni” waxa halkan loogu adeegsaday iyadoo fiqi ahaan la mida 2:15-17, waxaanay tilmaamaysaa dadka ka fog Ilaah (Yooxanaa 15:18-19; 17:14-15). Diidmada iyo silcinta ay dunidu inagula kacaysaa waxa ay caddayn u tahay meesha aan kaga jiro Masiixa (Matayos 5:10-16).

▣ **“maxaa yeelay, isagaba ma ay garanaynin”** waxa ay tani u noqonaysaa oo tilmaamaysaa Aabbaha, maxaa yeelay Injiilka Yooxanaa Ciise marar badan ayuu sheegayaa in aanay Isaga garanin (Yooxanaa 8:19, 55; 15:18, 21; 16:3). Magac u yaallada 1 Yooxanaa ku sugani waxa ay qaadan karaan wax ka badan hal macne (eeg fiirada 2:28). Macnaha halkan xagga naxwe ahaan marka laga eegana waa Aabbaha, laakiin fahanka aayadda 2 waxa weeyi Wiilka. Si kastaba ha ahaatee, Yooxanaa dhexdiisa waxa laga yaabaa in maldahaaddan loo kasay maxaa yeelay in Ciise la arkaa waxa ay ka dhigantahay in Aabbaha la arkay (Yooxanaa 12:45; 14:9).

3:2 “oo weli waxaynu noqon doonno lama muujin” weedhani waxa ay tilmaamaysaa Yooxanaa oo aan sifayn karin dhacdooyinka dhammaadka wakhtiga (Falimaha Rasuullada 1:7) ama dabecadda rasmiga ah ee jidhka la sara kiciyay (1 Korintos 15:35-49). Sidoo kale aayaddani waxay adkaynasaa 2:27 rumaystayaasha oo wax walba wada garan karin. Xitaa Ciise garashadiisa dhacdadani markii uu dhulka joogay waxa ay ahayd mid kooban (Matayos 24:36; Markos 13:22).

▣ **“goortuu muuqdo”** weedh shuruudeeddin loogalama jeedo iyada oo laga shakisan yahay Imaatinkiisa Labaad, laakiinse waa iyada oo aan la garanayn wakhtiga ay tahay.

▣ **“aynu noqon doonno sidiisa oo kale”** tani waxa ay tilmaamaysaa heerka ugu sarraysa ee la midnimada Masiixa (2 Korintos 3:18; Efesos 4:13; Filiboy 3:21; iyo Kolosay 3:4), waana hadiyo jeer midda lagu magacaabo “ammaanmitaanka” (Rooma 8:28-30), waana ku ammaanmitaanka badbaadada! Is bedelitaankan aakhiro waxa uu la xidhiidhaa soocelinta dhammayska tiran ee muuqaalka Ilaah ee ku sugan aadanaha (Bilowgii 1:26; 5:1, 3; 9:6), iyadoo markaasna weheshada Ilaah ay noqonayso mid suurto gal ah markale.

▣ **“waayo, waynu arki doonnaa isaga siduu yahay”** Ayuub ayaa u baahday inuu Ilaah arko (Ayuub 19:25-27). Ciisena waxa uu inoo sheegay in kuwa qalbigoodu nadiifta yahay ay arki doonaan Ilaah (Matayos 5:8). Aragtida Ilaah waxa ay ka dhigan tahay inaga oo isu bedeli doona inaan noqono sidiisa oo kale (1 Korintos 13:12). Tanina waxa ay tilmaamaysaa ammaanmitaanka rumaystaha (Rooma 8:29) marka labaad ee Ciise yimaaddo. Haddii “xaq ka dhigista” loogala jeedo ka xoroobitaanka xukunka denbiga, oo “quduus ka dhigistana” loogala jeedo ka xoroobitaanka awoodda denbiga, “ammaanmintaankuna” waxa uu noqonayaa ka xoroobidda gebi ahaanba joogitaanka denbiga!

3:3 “Oo mid kasta” erayga Giriigga ah ee *pas* toddoba jeer ayuu ka muuqanayaa 2:29 ilaa 3:10. Yooxanaa waxa uu adkaynayaa in aanu jirin wax ka dhexeeya, inuu qofku noqdo wiilka Ilaah ama inuu noqdo wiilka Shaydaanka (2:29; 3:3, 4, 6[labo jeer], 9, 10).

▣ **“rajadan”** qoraallada Bawlos middani waxa ay ku tilmaamaysaa Maalinta Qiyaamaha (Falimaha Rasuullada 23:6; 24:15; 26:6-7; Rooma 8:20-25; 1 Tesaloniika 2:19; Tiitos 2:13; 1 Butros 1:3, 21), waxaanu sheegayaa dhicitaanka dhacdadadan iyada oon la hubin wakhtiga ay noqon doonto.

Yooxanaa rajaynta Imaatinka labaad ugama hadlayo sida ay uga hadlayaan qorayaasha Axdiga Cusubi, waana markii ugu horraaysan ee qoraalladiisa uu halkan ku adeegsanayo. Yooxanaa waxa uu muhiimadda siinayaa waxyaalaha la xidhiidha ku sugnaanta Masiixa ee hadda! Laakiinse taas macneheedu maaha, in aanu rajaynaynin xukumista sharka (2:18) iyo ammaanmitaanka rumaystaha (3:1-3).

▣ **“naftiisuu daahiriya siduu isaguba daahir u yahay”** waa fal wakhti xaadirka jooga oo tusmayna sida. Daahirintu waa arrin muhiim ah (Matayos 5:8, 48). Waxa la inaga rabaa inaan iskaashi la samayno shaqada Ilaah ee ku jirta marxaladda quduus ka dhigista (2 Korintos 7:1; Yacquub 4:8, 1 Butros 1:22; 2 Butros 3:13, 14) sida ku sugan Yooxanaa 1:12 oo ka hadlaysay arrintan. Waxa aan arki karnaa loollanka ka dhexeeya awoodda Ilaah iyo masuuliyadda aadanaha marka laga eego dhinaca badbaadada, waxaana lagu arki karaa is barbar dhigista Yexesqeel 18:31 iyo Yexesqeel 36:26-27. Ilaah isaga ayaa hadiyo goor wax bilaaba (Yooxanaa 6:44, 65), laakiinse dadkiisa waxa uu ka rabaa inay ku jawaab celiyaan towbad keen iyo rumaysad buuxa, iyo sidoo kale inay ka jawaab celistan kusii socdaan iyagoo la imanaya addecitaan, adeeg, caabudis, iyo dadaal.

Tani waxa ay tusaale u noqon kartaa tukashada Ciise ee ku sugan Yooxanaa 17, gaar ahaan aayadaha 17, 19. Naftiisuu daahirayaa, iyagoo kuwa isaga raacaana nafhooda ay daahiriyaan. Waxa la yaab leh iyada oo qaabab kala duwan oo isku xidid ah la adeegsaday

1. Yooxanaa 17:17, 19 – *hagiazō* (*hagios*, Yooxanaa 10:36)
2. 1 Yooxanaa 3:3 – *hagnizō* (*hagnos*, Yooxanaa 11:55).

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 3:4-10

- A. Qaybtani waxa weeyi udub dhexaadka doodda dhex taalla fahanka khuseeya wanaagga Masiixiga (Rooma 6), mararka qaarna waxa lagu magacaabaa quduusnaanta buuxa, iyo kusii socoshada denbiga ee nolosha Masiixiga (Rooma 7).
- B. Waa in aynaan fahankeena u oggolaanin inuu saameeyo sida aan u fasirayno macnaha qoraalka, sidoo kalena waa in aynaan adeegsanin aayado kale oo saamayn inagu yeelan karta inta aynaan si fiican u diraaaynin macnaha ooynaan u hubinin waxa uu Yooxanaa ugala jeedo cutubka 3, iyo gebi ahaanba I Yooxanaa.
- C. Macnaha qoraalkani waxa uu si cad u tusinayaa ujeedada rumaystayaasha oo ah in laga xoroobo denbiga. Arrintan iyada ah waxa ka waramaysa Rooma 6. Haddaba awoodda Masiixa ayaa inoo suurta gelin karta in aan noolaano nolol bilaa denbi ah.
- D. Qaybtani waxa lagama maarmaan ah inay waafaqdo macnaha gebi ahaanba I Yooxanaa.
 1. Waxa doqonnimo ah in qaybtan la fasiro iyada oo ka soocan 1:8-2:2 (Masiixiyiinta oo ilaa hadda denbaabaya).
 2. Sidoo kale waxa nacasnimo ah in qaybtan loo fasiro si aan waafaqsanayn ujeedada Rasuul Yooxanaa ee ah adkaynta badbaadada ay kasoo horjeedaan macallimiinta beenta ahi.
 3. Waxa lagama maarmaan ah in qaybtani ay la xidhiidho waxyaalihii ay sheeganayeen macallimiinta beenta ahi, ha ahaato sheegashada wanaagga buuxa ama ha ahaato iyadoon denbiga wax dana aan laga galaynin. Waxa suurto gal ah 1:8-2:2 in ay la tacaalayso macallimiintii beenta ahaa, halka 3:1-10 ay kala tacaalayso mid kale. xusuusnow in fasiraadda waraaqaha Axdiga Cusubi ay la mid yihiin dhegaysashada wada sheekaysi tilifoon.
- E. Waxa jira kala duwanaansho u dhexeeya labadan qaybood. Denbigu nolosha Masiixiga waxa uu ku yahay dhibaato daa'im ah Axdiga Cusub dhexdiisa (Rooma 7). Xidhiidhka noocan ah waxa aan ka arkaynaa magacaabista hore iyo masuuliyadda doorashada, iyo damaanad qaadka iyo dadaalka. Ujeedada waxyaalahanina waa isu dheelli tir fiqi ahaaneed iyo diimada xagjirnimada.
- F. Falaqaynta fiqi ahaaneed gebi ahaanteedu waxa ay ku salaysan tahay fahanka qaldan ee laga qaadan karo farqiga u dhexeeya:
 1. Booska aan ka taaganahay Masiixa
 2. Sida aan ugu socono dhammaystirka booskan maalinkasta oo nolosheenna ka mida
 3. Ballan qaadka ah inaan maalin maalmaha ka mida heli doonno guusha!

Waxa aan ka xorownay ciqaabta denbiga (xaq ka dhigis), inagoo taas ku helnay Masiixa, laakiin weli waxa aan la tacaalaynaa sidii aan ugu xoroobi lahayn awooddiisa (marxaladda quduusnaanta), maalin maalmaha ka midana, waxa aan ka xoroobi doonaa jiritaankiisa (ammaanmitaan).

- G. Qaab suugaaneedka labaalaha ah ee Yooxanaa ayaa ah isaga oo madaw iyo caddaan wax u qoraya, waxayna la mid tahay sida qoraallada laga helay Badda Dhimatay. Waxa uu sheegayaa in midkasta oo ku jira Masiixu uu yahay xaq, midkasta oo ku jira Shaydaankuna waa denbiile, mana jiro wax intaas dhaafsiisani. Amarkana waxa ku sugnaaday baaqitaan loo baaqayo Masiixiyiinta aan cibaadada lahayn, kuwaasi oo ah kuwa yimaadda aroosyada, geerida, amaba adeegyada dhalashada iyo waxyaalaha la midka ah.
- H. Kuwo ka mida maraajicda faa'idada leh.
1. Si aad akhrisato toddoba dariiqo oo loo fahmi karo qaybtan eeg “The Epistles of John” in *The Tyndale New Testament Commentaries* by John R. W. Stott, Eerdmans, pp. 130-136.”
 2. Si aad u aragto halka uu taagan yahay ka ku dhawaaqaya wanaagsanaanu eeg *Christian Theology*, Vol. II, p. 440ff by H. Orlon Willie, Beacon Hill Press.
 3. Wax ku saabsan caqiidada ka sheeganaya in denbiga lagu socdo eeg “Perfectionism” by B. B. Warfield, The Presbyterian and Reformed Published Company.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 3:4-10

⁴Kii kasta oo dembi falaa wuxuu falaa caasinimo; oo dembigu wuxuu yahay caasinimo. ⁵Oo idinku waad og tihiin in isagu u muuqday inuu dembiyadeenna inaga qaado, oo isagu dembi ma leh. ⁶Ku alla kii isaga ku sii jiraa, ma dembaabo; ku alla kii dembaabaa ma uu arkin isaga, oo weliba ma yaqaan isaga. ⁷Carruurtiyey, yaan cidididin khiyaanayn; kii xaqnimo falaa waa xaq siduu isaguba xaq u yahay. ⁸Kii dembi falaa wuxuu yahay kan Ibliiska; oo Ibliisku tan iyo bilowgii ayuu dembaabayay. Taas aawadeed ayuu Wiilka Ilaah u muuqday inuu baabi-- iyo shuqullada Ibliiska. ⁹Ku alla kii Ilaah ka dhashay dembi ma falo; maxaa yeelay, Ilaah dabiicaddiisu way ku sii jirtaa isaga; oo ma dembaabi karo, waayo, wuxuu ka dhashay Ilaah. ¹⁰Tan ayay carruurta Ilaah iyo carruurta Ibliisku ku kala muuqdaan; ku alla kii aan xaqnimo falin ma aha kan Ilaah, oo waxaa la mid ah kan aan walaalkii jeclayn.

3:4

NASB	“Kii kasta oo dembi falaa wuxuu falaa caasinimo” \
NKJV	“ku kasta oo denbaabaa wuxuu sameeyaa macsi”
NRSV	“midkasta oo denbi gala waa denbiile caasinnimo sameeyay”
TEV	“ku kasta oo denbaabaa waxa uu denbiile ku yahay sharciga Ilaah oo uu jebiyay”
NJB	“ku kasta oo denbaabaa waxa uu sameeyay xumaan”

Magac u yaalka ah “kii kasta” ayaa ugu horreeya aayaddan iyo aayadda 6, waxaanu macnuhu tilmaamayaa aadanaha!

Waa magaca fal sameeyaha iyo falka wakhti xaadirka jooga ee ku dhisan garashada isla markaasna tusmaynta sida. Waxa muhiim ah in loo fiirsado falalka wakhti xaadirka jooga ee xoojinaya kusoo socoshada iyo caadada qaab nololeedka, iyaga oo la barbar dhigayo falalka wakhtiga tegay ee ku dhisan garashada isla markaasna wax loo tiirinayo sida ku sugan 2:1-2. Si kastaba ha ahaatee, dhibaataada fahan ahaaneed ee qaybtan (is barbar dhig 1:7-10 iyo 3:6-9) laguma xallin karo wakhtiyada falalka, laakiin waxa lagu xallin karaa garashada taariikh ahaaneed ee macallimiintii beenta ahaa ee Gonostiga, gebi ahaanba ujeedada kitaabkuna waa sidaas oo kale.

Waxyaabaha gaarka u ah qaybtan waxa ka mida adeegsiga “caasinnimo,” kamana hadlayo oo keliya jebinta sharciga (Sharcigii Muuse) laakiin waxa ay ka hadlaysaa caasinimada iyo madax adaygga. Eraygan waxa haddaba loo adeegsaday ka geesnoqoshada Masiixa sida ku sugan 2 Tesaloniika 2:3, 7. Waxa kale oo ay guud ahaan tilmaami kartaa denbiga (Yooxanaa 9:41; Rooma 14:23; Yacquub 4:17; 1 Yooxanaa 5:17), waxaanay liddi ku tahay lamidnimada Masiixa (aayadda 5), mana aha jebinta qaanuun amaba shay wax lagu qiyaaso oo gaar ah.

3:5 “in isagu u muuqday” waa fal tegay oo tilmaamaya jidh soo qaadashada Ciise (aayadda 8; 2 Timoteyos 1:10). Isla falkan *phaneroō*, ayaa labo jeer lagu adeegsaday aayadda 2 iyadoo la tilmaamayo Soo noqoshada Labaad. Ciise imaatinkiisii hore waxa uu ahaa inuu badbaado keeno (Markos 10:45; Yooxanaa 3:16; 2 Korintos 5:21), laakiinse waxa uu soo noqon doonaa isaga oo boqor ah waxna kala xukumi doona. Mid ka mida

macallimiintayda aan ugu jeclahay oo ah Bill Hendricks ayaa tafsiirkiisa *The Letters of John*, waxa uu ku leeyahay:

“Labo hadal oo muhiim ah ayaa loogala jeeda Imaatinka Ciise ee aan ka arkayn aayaddan iyo aayadda 8. Ciise waxa Ilaah usoo diray ugu horrayn inuu denbiyadeenna innaga kor qaado (3:5), waxaanu ka takhalusay shaqada shaydaanka (3:8). Luukos ayaa isna injiilkiisa ku diiwaan gelinaya in Ciise uu u yimid si uu ugu yeedho oo u badbaadiyo kuwa lumay (Luukos 19:10), sidoo kalena injiilka Yooxanaa ayaa isna sheegaya inuu Ciise u yimid si uu idihiisa usiiyo nolol wanaagsan (10:10), halka Matayos isna marka uu fasirayo magaca Ciise waxa uu yahay, uu ka sheegayo inuu u yimid si dadkiisa uu denbiyada uga kor qaado (Matayos 1:21). Xaqiiqada ugu muhiimsan ee dhammaanba hadalladan ku jirtaayi waxa weeyi, in Ciise uu aadanaha u suurto geliyay wax aanay iyagu keensan karaynin” (pp. 79-80).

▣ **“inuu dembiyadeenna inaga qaado”** waa fal tegay oo wax loo tiirinayo. Arrintu waxa ay ku xidhantahay ka jawaab celinta aadanaha oo ah inay la yimaaddaan towbad keen iyo rumaysad.

Ujeedada ka danbaysa hadalkan ayaa waxa ay noqon kartaa labo arrimood oo suurto gal ah:

1. Maalinta kafaara gudka (Laawiyyiintii 6) halkaasoo mid ka mida labada wan uu denbiyada dadka ka fogaynayay meesha dadku ay ku noolyihiin (Yooxanaa Baabtiisaha ayaa middan ku adeegsaday Yooxanaa 1:29).
2. Tilmaamista wixii Ciise ku dul sameeyay iskutallaabta (Ishacyaah 53:11-12; Yooxanaa 1:29; Cibraaniyada 9:28; 1 Butros 2:24).

▣ **“oo isagu dembi ma leh”** waa fal wakhti xaadirka jooga isla markaasna tusmayn xambaarsan. Ciise oo wax denbi ah aan lahayni (Yooxanaa 8:46; 2 Korintos 5:21; Cibraaniyada 4:15; 7:26; 1 Butros 1:19; 2:22) waxa ay asaas u tahay isaga oo inaga kafaara gudka denbiyadeenna noqday (Ishacyaah 53).

Fiiro u yeelo erayga “denbi” oo qaybta hore ah jamac isagoo qaybta labaad ee aayaddana ah keli. Marka uu jamaca yahay waxa uu sheegayaa falal denbei ah, halka marka uu kelida yahayna uu ka sheegayo Masiixa oo baarri buuxa ah. ujeedadu waxa weeyi in rumaystayaasha ay Masiixa la wadaagaan quduusnaan. Denbigu waxa uu yahay mid ka gaar ah Masiixa iyo kuwa isaga raaca.

MAWDUUC GAAR AH: QUDUUSNAANTA

Axdiga Cusubi wuxuu inoo sheegayaa marka denbiilayaashu usoo laabtaan Ciise Masiix ee ay towbad keenaan, in markaas xaq laga dhigi doono. Waxay tan ku helaysaan Masiixa, maxaa yeelay xaqnimadiisa ayuu iyagana gelinayaa (Rooma 4). Waxa ay noqonayaan kuwo xaq ah oo quduus ah.

Laakiin sidoo kale Axdiga Cusubi waxa uu rumaystayaasha farayaa inay noqdaan kuwo camal suuban leh. Shaqada Masiixu qabtay waa mid iyaga xaq ka dhigtay, laakiin haddana fikirkooda iyo qaab nololeedkuudu waa inuu ahaado la midnimada Masiixa. Sida badbaadadu u tahay hadiyadda oo qiimahana u leedahay, ayaa qaab nololeedkuna la rabaa inuu ahaado taas oo kale.

Ka jawaab bixinta asalka ah

Falimaha Rasuullada 20:23; 26:18
Rooma 15:16
1 Korintos 1:2-3; 6:11
2 Tesaloniika 2:13
Cibraaniyada 2:11; 10:10,14; 13:12
1 Butros 1:1

La midnimada Masiixa

Rooma 6:19
2 Korintos 7:1
1 Tesaloniika 3:13; 4:3-4,7; 5:23
1 Timoteyos 2:15
2 Timoteyos 2:21
Cibraaniyada 12:14
1 Butros 1:15-16

3:6 “Ku alla kii isaga ku sii jiraa, ma dembaabo” sida aayadda 3:4 oo kale, kanina waa fal wakhti xaadirka jooga oo tusmayn wada. Aayaddani waxa ay ku dhowdahay 1:8-2:2 iyo 5:16.

▣ **“ku alla kii dembaabaa ma uu arkin isaga, oo weliba ma yaqaan isaga”** waa magaca falsameeya oo ay la socdaan labo fal oo ebyan isla markaana sida tusmayn. Denbiga oo si joogto ah loo galaa waxa ay tusinaysaa in qofku aanu garanayn Masiixa weligiisna hore u garanin. Masiixiyiinta denbiga kusii socdaa waxa ay carqaladeeyaan:

1. Farriinta Masiixa
2. Ujeedada lamidnimada Masiixa
3. Waxa ay muujinaysaa asalka ruux ahaaneed ee qofka (Yooxanaa 8:44).

3:7 “yaan cidi idin khiyaanayn” waa ficil amar ah oo ay la socoto diidmo tilmaamaysa joojinta arrin hore u socotay. Joogitaanka macallimiinta beenta ahi (2:26) waxa ay asal u tahay fahanka saxda ah ee 1 Yooxanaa guud ahaan iyo gaar ahaan 1:7-10 iyo 3:4-10.

▣ **“kii xaqnimo falaa waa xaq”** aayaddan lagama sooci karo macnaha guud ee qaybtan adeegsigeeduna waxa uu difaacayaa caqiidada (“xaq kunoqoshada camallada”). Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa in aadanuhu aanay Ilaaha quduuska ugu dhowaan karin waxyaalohooda u gaarka ah, laakiin waxa laga rabaa inay ka jawaab celiyaan Ilaah badbaadada uu soo ban dhigay, taasi oo Ciise uu ku dhammays tiray iskutallaabtaa korkeeda. Dadaalkeenu maaha mid inoo dhowayn kara Ilaah, laakiinse waxa uu ina tusi karaa xaaladdeena ruux ahaaneed (Muujintii 22:11) iyo qaangaadhnimadeena badbaadada dabadeed. Carmallada wanaagsan kuma badbaadayno, laakiin waxa aan u badbaadaynaa si aan u samayno carmallada wanaagsan. Ujeedada Ilaah inoo siiyay Masiixu waxa weeyi inaan ku dayano Masiixa (Efesos 2:8-9, 10). Doonista Ilaah maaha in rumaystuhu uu galo jano oo keliya dhimashada kaddib (baarrinimada ugu danbaysa), laakiin waa la midnimada Masiixa ee noloshan (baarrinimada maalinkasta) (Matayos 5:48; Rooma 8:28-29; Galatiya 4:19)! Wax ku saabsan xaqnimada ka eeg Mawduuca Gaarka ah 2:29.

3:8 “Kii dembi falaa wuxuu yahay kan Ibliiska” waa fal wakhti xaadirka jooga oo garasho ku dhisan. Carruurta Ilaah siday u noolyihiin waxa laga yaqaanaa sida ay u noolyihiin kuwa Shaydaanku (3:10; Matayos 7:13; Efesos 2:1-3).

▣ **“oo Ibliisku tan iyo bilowgii ayuu dembaabayay”** waa fal wakhti xaadirka jooga oo ku dhisan garasho tusmayna xambaarsan. Aayaddani (Yooxanaa 8:44) ma waxay tilmaamaysaa abuurkii mise caasinimada malaa’igta?

Fiqi ahaan waxa adag wakhtigii Shaydaanku Ilaah caasiyay. Ayuub 1-2; Sekaryaah 3 iyo 1 Boqorradii 22:19-23 waxa looga arki karaa in Shaydaanku inuu yahay adeegaha Ilaah, iyo inuu yahay mid ka mida malaa’igtiisa la taliya. Waxa suurto gal ah cabirista isla weynida boqorrada bariga (Baabel, Ishacyaah 14:13-14, ama Turos, Yexesqeel 28:12-16) in loo adeegsaday sheegista caasinimada Shaydaanka (Yexesqeel 28:14, 16). Si kastaba ha ahaatee, Luukos 10:18 waxa aan ka arki karnaa, Ciise oo arkay Shaydaan sida hillaaca oo kale samada uga soo dhacaya, laakiinse inoogama waramayo wakhtiga dhacdadaas. Mawduuca ka hadalka asalka sharka iyo sidii ku horu maray waa mid aan la hubin, maxaa yeelay dhinacan marka laga eego muujintu maaha mid kaafiyaysa. Waxaad iska ilaalisaa inaad aayado ama calaamado uruursato si aad caqiido usoo saarto! Falaqaynta ugu habboon ee mawduucan waxa aad ka heli kartaa A. B. Davidson kitaabkiisa *Old Testament Theology*, oo ay daabacday T & T Clark, pp. 300-306. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 12:31.

▣ “Wiilka Ilaah” eeg Mawduucan Gaarka ah.

▣ “u muuqday” erayga Giriigga ah ee *phaneroō*, waxa macnihiisu yahay “iftiimin.” Aayadaha 5 iyo 8 waa isku mid, waxaanay ka hadlayaan Ciise oo jidh soo qaatay isla markaasna muuqday (1:2). Dhibaataada macallimiinta beenta ahi may ahayn iyagoo Injiilku aanu u caddayn, laakiinse waxa ay wateen fikiro falsafadadeed iyo fiqi ahaaneed oo iyaga gaar u ah.

MAWDUUC GAAR AH: WIILKA ILAAH

Kani waa magaca ugu badan ee Axdiga Cusubi ku magacaabayo Ciise Masiix. Waxa hubaala in magacani uu yahay ilhaamin amaba waxyi ka yimid xagga Ilaah, oo waxa uu Ciise ku tilmaamayaa ‘Wiilka’ amaba ‘Wiilkayga’, sidoo kalena Ilaahna wuxuu ka dhigan yahay ‘Aabbaha’. Haddaba, magacani wuxuu Axdiga Cusub kusoo dhex arooray 124 jeer, oo xitaa Ciise Masiix isagu shakhsi ahaantiisa waxa uu ku tilmaamayaa ‘Wiilka Aadanaha’, waana waxyi la xidhiidha Daanyeel 7:13-14.

Marka aan eegno Axdiga Hore magaca ‘wiil’ waxa lagu magacaabi karaa afar kooxood:

1. Malaa’igaha (hadiyo goorna waa koox ahaan, Bilowgii 6:2; Ayuub 1:6; 2:1).
2. Boqorka Israa’iil (2 Samuu’eel 7: 14; Sabuurka 2:7; 89:26-27).
3. Umadda reer Israa’iil oo dhan (Baxniintii 4:22-23; Sharciga Kunoqoshadiisa 14:1; Hoosheeca 11:1; Malaakii 2:10).
4. Xaakinada Israa’iliyiinta ah (Sabuurka 82:6).

Haddaba, labo jeer ayaa Ciise Masiix loo tiiriyaa magacan, waana ‘wiilkii Daa’uud’ iyo ‘Wiilka Ilaah’ labadubana waxay la xidhiidhaan 2 Samuu’eel 7; Sabuurka 2 iyo 89. Marka aan eegno Axdiga Hore ‘Wiilka Ilaah’ si gaara looguma isticmaalin Masiixa marka laga reebo isagoo ah mid loo doortay boqornimada Israa’iil (eeg maraajicda *Dictionary of Jesus and the Gospels* p. 770). Sidoo kale “Wiilka Ilaah” waa magac la xidhiidha Masiixa, waana marka la eego (2 Esdras 7:28; 13:32,37,52; 14:9 iyo Enoch 105:52).

Magacani wuxuu aad uga dhex muuqdaa Axdiga Cusub, waxaan ka arki karnaa meelo badan oo sigaara u tilmaamaya:

1. Jiritaankiisii hore (Yooxanaa 1:1-18).
2. Isagoo ka dhashay gabadh bikro ah oon nin arag (Matayos 1:23; Luukos 1:31-35).
3. Markii la baabtiisayay (Matayos 3:17; Markos 1:11; Luukos 3:22. Codka Ilaah ee samada ka yimid wuxuu midaynayaa boqortooyada Sabuurka 2 iyo adeegaha dhibaatoonaya ee Ishacyaah 53).
4. Jirraabadii shaydaanka (Matayos 4:11; Markos 1:12,13; Luukos 4:1-13. Wuxuu shaydaanku isku dayay inuu ka shaki geliyo inuu yahay Wiilka Ilaah amaba ugu yaraan inuu ujeedooyinkiisa ku dhammays tiro waxyaalo ka gedisan tan isku tallaabta).
5. Isagoo ay qireen kuwo kasoo horjeeday
 - a. jinniyadii iyo ruuxyadii wasakhaysnaa (Markos 1:23-25; Luukos 4:31-37; Markos 3:11-12).
 - b. Rumaysad laawayashii (Matayos 27:43; Markos 14:61; Yooxanaa 19:7).
6. Xertiisa oo qirtay
 - a. Matayos 14:33; 16:16
 - b. Yooxanaa 1:34,49; 6:69; 11:27
7. Isagoo naf ahaantiisa qiray
 - a. Matayos 11:25-27
 - b. Yooxanaa 10:36
8. Isagoo Ilaah kasoo qaaday Aabbihiis
 - a. Ilaah wuxuu ugu yeedhay ‘Aabbow’
 - (1)Markos 14:36
 - (2) Rooma 8:15
 - (3) Galatiya 4:6
 - b. Isagoo adeegsaday erayga Aabbe (*patēr*) si uu u tilmaamo xidhiidhka uu la leeyahay Aabbaha iyo Ilaahnimadiisa.

Marka aan soo koobno magacan ah “Wiilka Ilaah” waxa uu macne wayn u leeyahay kuwa yaqaanay Axdiga Hore iyo ballan qaadyadii lagusii sheegay, laakiin qorayaasha Axdiga Cusub, waxa ay dhibaato kasoo gaadhaysay sida ay u isticmaalaan dadka aan Yuhuudda ahayni, maxaa yeelay waxay ahaayeen jaahiliin aan waxba aqoonin.

NASB (UPDATED) TEXT: 3:11-12

¹¹Oo kanu waa warkii aad tan iyo bilowgii maqlayseen, kaasoo ah inaynu isjeclaanno, ¹²oo aynaan ahaanin sida Qaabiil oo ahaa kan sharka leh oo walaalkii dilay. Oo muxuu u dilay? Waayo. shuqulladiisu waxay ahaayeen shar, oo kuwii walaalkiisna xaq bay ahaayeen.

▣ **“inuu baabi-- iyo shuqullada Ibliiska”** ujeedada Ciise jidhka usoo qaatay waxa ay ahayd inuu “baabi’iin” (fal tegay oo qaabkiisu yahay tiirin *luō*), waxaanu arrintaas ku xaqiijiyay Golgota, laakiinse aadanaha waxa laga rabaa inay ka jawaab celiyaan oo rumaysad la yimaaddan (Rooma 3:24; 6:23; Efesos 2:8) iyagoo isaga rumaysad ku aqbalaya (Yooxanaa 1:12; 3:16).

Axdiga Cusubi waxa uu ka waramayaa “arrin hore loo dhammays tiray balse weli ah” taasina waxa ay sidoo kale ku dabaqmaysaa baabi’iinta shaydkaanka. Sharka waa la baabiiyay laakiinse dunida waa uu kasii dhex shaqayn doonaa ilaa inta ay B oqortooyada Ilaah ka dhammays tirmayso.

3:9 “Ku alla kii Ilaah ka dhashay” waa magaca falsameeyaha aan la garanayn (sinaanshaha aayadda 9c; 2:29; iyo 5:18) waxa ay ka hadlaysaa xaalad ku ahaatay adeege dibadda ka yimid (Ilaah).

▣ **“dembi ma falo”** falka wakhti xaadirka jooga ee ku dhisan garashada waxa kasoo horjeeda fal wakhti tegay ah sida 2:1. Labo siyaabood ayaa loo fasiri karaa hadalkan:

1. Waxa ay la xidhiidhaa waxbaristii macallimiintii Gonostiga ee beenta ahayd, kuwaas oo fahanka badbaadada la xidhiidhiyay caqli iyo garasho iyadoo ka soocan akhlaaqda.
2. Adeegsiga falka wakhti xaadirka joogaa waxa uu tusinayaa kusii socoshada marwalba joogta ee denbiga (Rooma 6:1), mana aha dembiyo gaara oo lagu tallaabsado (Rooma 6:15).

Arrinta fiqi ahaaneed ee ay caddaynaso Rooma 6 (suurta galnimada denbi gelis la’aanta) iyo Rooma 7 (rumaystaha oo la jihaadaya denbiga).

Waxay u muuqataa in #1 uu yahay taariikh ahaan marka la eego macnaha ugu habboon, halka #2 ay inoogaga baaqayso ku dabaqista camalka ee nolosheenna maanta. Falaqayn wanaagsan waxa aad ka heli kartaa *Hard Sayings of the Bible*, oo ay leeyihiin Walter Kaiser, Peter, F. F. Bruce, iyo Manfred Brauch, pp. 736-739.

▣ **“maxaa yeelay, Ilaah dabiicaddiisu way ku sii jirtaa isaga”** waa fal wakhti xaadirka jooga kuna dhisan garasho oo tusmayn xambaarsan. Waxa jirta aragtiyo dhowra oo ku saabsan “Dabiicaddiisa” waxa loogala jeedo

1. Augustine iyo Luther waxa ay rumaysan yihiin in loogala jeedo Erayga Ilaah (Luukos 8:11; Yooxanaa 5:38; Yacquub 1:18; 1 Butros 1:23).
2. Calvin ayaa isna sheegay in loogala jeedo Ruuxa Quduuska ah (Yooxanaa 3:5, 6, 8; 1 Yooxanaa 3:24; 4:4, 13).
3. Qaar ayaa rumaysan in loogala jeedo Ilaah dabeecaddiisa (2 Butros 1:4; Efesos 4:24).
4. Waxa laga yaabaa inay sheegayso Masiixa laftiisa “farcanka Ibraahim” (Luukos 1:55; Yooxanaa 8:33, 37; Galatiya 3:16).
5. Kuwo kale ayaa iyaguna rumaysan in middani ay la mid tahay “ka dhasha Ilaah.”
6. Waxa muuqata in eraygan ay Gonositigu u adeegsadeen iyagoo raba inay Ilaah dadka ka soocaan.

Waxay u muuqataa in #4 uu yahay macnaha ugu habboon marka la eego aragtiyahan, laakiinse erayada Yooxanaa waxa ay xidhiidh la leeyihiin Gonostiga (#6).

3:10 aayaddani waxa ay soo koobaysaa aayadaha 4-9. Waxa ay koobsanaysaa labo fal oo wakhti xaadirka jooga kuna dhisan garasho dhammaantoodna waxa ay tilmaamayaan fal soconaya. Fahan ahaan aayaddani waxa ay la mid tahay wacdintii Ciise ee Buurta dusheeda (Matayos 7:16-20). Nolosha qofku waxa ay muujinaysaa waxa qalbigiisa ku jira sidoo kalena waxa ay ka tarjumaysaa noloshiisa ruux ahaaneed.

Tani waa diidmada dulucda u ah 2:29!

▣ **“carruurta Ilaah...carruurta ibliiska”** halkan waxa aan ka arki karnaa Yooxanaa asalkiisa sematigga ah. luqada Cibraanigu iyadoo qadiim ah may koobsanaynin sifada, sidaasi darteedna waxa la adeegsaday “carruurta...” iyadoo la tilmaamayo shakhsiyaadka.

3:11 “warkii” erayga Giriigga ah (*aggelisa*) waxa lagu adeegsaday oo keliya 1 Yooxanaa 1:5 iyo 3:11. Adeegsigeeda hore waa arrin caqiido ahaan, halka adeegsigeeda labaadna uu ka yahay arrin akhlaaq ahaaneed, tanina waxa ay isu dheelli tiraysaa labadan arrimood ee Masiixiyadda (1:8, 10; 2:20, 24; 3:14).

▣ **“tan iyo bilowgii maqlayseen”** erayadani macno ahaan waxa ay la xidhiidhaan Ciise oo ah erayga Ilaah ee nool (Yooxanaa 1:1) iyo muujinta Erayga Ilaah (1:1; 2:7, 13, 14, 24; 2 Yooxanaa 5, 6).

▣ **“kaasoo ah inaynu isjeclaanno”** tani waa caddaynta ay rumaystayaasha ku ogaanayaan in si runa loo badbaadiyay (aayadaha 10, 14). Waxa ay sheegaysaa ereyadii Ciise (Yooxanaa 13:34-35; 15:12, 17; 1 Yooxanaa 3:23; 4:7-8, 11-12, 19-21).

3:12 “Qaabiil” noloshii Qaabiil wax ku saabsan waxa aan ka helaynaa Bilowgii 4:4 (Cibraaniyada 11:4), halkaasoo la isku barbardhigay qurbaankii Haabiil iyo kii Qaabiil. Waxyaalihii Qaabiil ku tallaabsadayna waxa ay muujinayaa leexashada aadanaha (Bilowgii 4:7; 6:5, 11-12, 13). Qaabiil waxa noqday tusaale caasimada iyo sharka looga dhex adeegsado Yuhuudda iyo Masiixiyadda (Cibraaniyada 11:4; Yuudas 11).

▣ **“oo ahaa kan sharka leh”** waxa suurto gal ah in qaabka naxwe ahaaneed uu yahay kelida labka ah (kan sharka leh, aayadda 10) ama dhexdhexaad keli ah (sharka). Qaabkan naxwe ahaaneed oo kale waxa uu kusoo aroorayaa Matayos 5:37; 6:13; 13:19, 38; Yooxanaa 17:15; 2 Tesaloniika 3:3; 1 Yooxanaa 2:13, 14; 3:12; iyo 5:18-19. Marar badan ayaana macnahu uu tusinayaa Shaydaanka (Matayos 5:37; 13:38; Yooxanaa 17:15).

3:13 “ha la yaabina” waa ficil amar ah oo wakhti xaadirka jooga lana socoto diidmo tilmaamaysa joojinta fal hore u socday (1 Butros 4:12-16). Dunidani maaha meel caddaaladi taallo, mana aha dunida ay Ilaah ujeedadiisu ahayd.

▣ **“haddii”** waa weedh shuruudeed heerka koobaad ah xagga qoraagana waxa ay ka tahay sax ama waa ujeedo suugaan ahaaneed.

NASB (UPDATED) TEXT: 3:13-22

¹³Walaalayaalow, ha la yaabina haddii ay dunidu idin neceb tahay. ¹⁴Waxaynu og nahay inaynu dhimashada ka soo gudubnay oo aynu u soo gudubnay nolosha, maxaa yeelay, walaalaha ayaynu jecel nahay. Oo ka aan walaalkii jeclayn. dhimashadu ku sii hadhaa. ¹⁵Ku alla kii walaalkii neceb waa dhiigqabe, oo idinkuna waad og tihiin inaanu dhiigqabena lahayn nolosha weligeed ah oo ku sii jiraysa. ¹⁶Taasaynu jacaylka ku garanaynaa, waayo, isagu naftiisuu u bixiyey aawadeen; oo innaguna waa inaynu nafteenna u bixinno walaalaheen. ¹⁷laakiin kan leh xoolaha dunidan, oo arka walaalkiis oo baahan, oo qalbigiisa ka xidha, sidee baa jacaylka Ilaah ugu jiraa isaga? ¹⁸Carruurtaaydiyey, yaynaan ku jeclaaniin hadalka iyo afka toona, laakiin camalka iyo runta aan ku jeclaanno. ¹⁹Oo taasaynu ku garan doonnaa inaynu kuwa runta nahay, oo aynu isaga hortiisa qalbigeenna kaga dhiiro gelin doonnaa ²⁰xagga wax alla wixii qalbigeennu inagu eedeeyo, maxaa yeelay, Ilaah waa ka weyn yahay qalbigeenna, oo wax walbaba wuu og yahay. ²¹Gacaliyayaalow, haddii aan qalbigeennu ina eedayn, kalsoonaan ayaynu ku leennahay xagga Ilaah. ²²Oo wax kastoo aynu ka barinno waynu ka helnaa, maxaa yeelay, qaynuunnadiisa ayaynu xajinnaa, oo waxaynu falnaa waxa isaga ka farxiya.

▣ **“dunidu idin neceb tahay”** dunidu waxa ay necbaatay Ciise sidoo kalena waxay necbaanayaan kuwa isaga raaca. Mawduucani waxa uu marar badan ka muuqanayaa Axdiga Cusub dhexdiisa (Yooxanaa 15:18; 17:14; Matayos 5:10-11; 2 Timoteyos 3:12), middanina waxa ay caddayn u tahay inuu qofku yahay rumayste.

3:14 “Waxaynu og nahay” waa fal ebayn oo ku dhisan garasho tusmayna xambaarsan (*oida* waxa ay leedahay qaabka dhammayska tiran, laakiin macneheedu wuxuu ka dhiganyahay wax jooga). Mawduucanina waxa uu kusoo noqnoqonayaa Axdiga Cusub. Kalsoonida Ilaah laga qabaa waxa ay la xidhiidhaa (1) is beddelka maskaxda iyo (2) bedelitaanka camalka, kuwaasi oo ah macnaha asalka u ah erayga “towbadkeen” marka aan eegno luqada Giriigga iyo Cibraanigaba.

▣ **“inaynu dhimashada ka soo gudubnay oo aynu u soo gudubnay nolosha”** waa fal ebyan oo ku dhisan wax la garanayo (Yooxanaa 5:24). Inaynu isjeclaannaa waxa ay caddayn u tahay, inaga oo kasoo gudubnay dhimashada oo nolol helnay (eeg Mawduuca Gaarka ah 6:37), caddaynta kalena waxa weeyi dunida oo ina necbaata.

▣ **“maxaa yeelay, walaalaha ayaynu jecel nahay”** waa fal wakhti xaadirka jooga kuna dhisan wax la garanayo isagoo tusmayn sida. Jacaylku waxa uu yahay calaamadda qoyska Ilaah (Yooxanaa 13:34-35; 15:12, 17; 2 Yooxanaa 5; 1 Korintos 13; Galatiya 5:22), maxaa yeelay waa calaammadda Ilaah (4:7-21). Jacaylku maaha aasaaska xidhiidhka Ilaah lala yeelanayo laakiin waa natiijada ka dhalanaysa xidhiidhka isaga lala yeesho, sidoo kalena asaas uma aha badbaadada, laakiin waa caddaynta in badbaado jirto.

▣ **“Oo ka aan walaalkii jeclayn. dhimashadu ku sii hadhaa”** waa magaca fal sameeyaha la garanayo ee loo adeegsaday isagoo ah falsameeye wakhti xaadirka jooga. Halka rumaystayaashu ay kaga sii sugnaanayaan jacaylka, kuwa aan rumaysadka lahaynina waxa ay kusii jirayaan nacaybka. Nacaybku sidoo kale waxa uu yahay mid ka tarjumayay ruuxa shakhsiga.

3:15 “Ku alla” Yooxanaa eraygan (*pas*) waxa uu adeegsanayaa 8 jeer laga soo bilaabo 2:29. Ujeedada middan uu ka leeyahayna waxa ay tahay, inaanay jirin wax kasoo hadha intaa uu sheegay. Waxa jira mid jacayl leh iyo mid nacayb leh, wax saddexeeyaana ma jiro.

▣ **“kii walaalkii neceb waa dhiigqabe”** waa magaca fal sameeyaha la garanayo ee tusmaynta sida (necbaansho soconaya). Ciise wacdintiisii buurta dusheeda waxa uu ku sheegayaa in denbigu uu ku bilaabmo ku fikiristiisa (Matayos 5:21-22).

▣ **“oo idinkuna waad og tihii inaanu dhiigqabena lahayn nolosha weligeed ah oo ku sii jiraysa”** middan loogalama jeedo in dhiigya qabku aanu noqon karin Masiixi. Ilaah waa uu dhaafaa denbiga, laakiinse qaab nololeedku waxa uu ka tarjumaa waxa ku jira qalbiga. Ka kusii socda nacaybku ma noqon karo Masiixi, maxaa yeelay jacaylka iyo nacaybku meel ma wada gali karaan! Nacaybku wuxuu baabiiyaa nolosha halka jacaylkuna uu ka dhiso.

3:16 “taasaynu ku garanaynaa” waa falka ebyan ee tusmaynta wada lana garanayo. Falka lagu adeegsaday aayadda 15 wuxuu ahaa *oida*, halkana waa *ginōskō*. Labadana isku mid iyagoo ah ayaa lagu adeegsaday qoraallada Yooxanaa.

▣ **“jacaylka”** Ciise waxa uu tusiyay tusaalaha ugu wanaagsan ee jacaylku sida uu yahay. Rumaystayaashuna waa inay raacaan tusaalihiisa (2 Korintos 5:14-15).

▣ **“isagu naftiisuu u bixiyey aawadeen”** waa fal dhacay wakhtiga tegay kaasi oo sheegaya Golgota ama Dhakada, waxaanay sheegaysaa ereyadii Ciise (Yooxanaa 10:11, 15, 17, 18; 15:13).

▣ **“oo innaguna”** rumaystayaasha waa inay ku daydaan tusaalaha Ciise (2:6; 4:11).

▣ **“waa inaynu nafteenna u bixinno walaalaheen”** Masiixu waa tusaalaha, oo sidii uu naftiisa ugu bixiyay kuwa kale aawadood, Masiixiyiintu waa inay sidaas oo kale yeelaan oo nafhooda kuwa kale dartood u bixiyaan haddii loo baahdo. U dhimashada xaasidnimo la'aantu waxa ay tusinaysaa

1. Iyadoo liddi ku ah leexashada
2. Soo celinta muuqaalka Ilaah
3. Unoolaanshaha iyadoo iskaashi laga samaynayo waxa wanaagsan (2 Korintos 5:14-15; Filiboy 2:5-11; Galatiya 2:20; 1 Butros 2:21).

3:17 “laakiin kan leh xoolaha dunidan, oo arka walaalkiis oo baahan” waa labo fal oo wakhti xaadirka jooga waxna loo tirinayo. Inuu qof naftiisa u bixiyo kuwa kale dartood sida ku sugan aayadda 16 ayaa markale iyada oo dabiqitaana ay halkan ka muuqataa. Waxa aayadahani ay u eegyihin Yacquub (Yacquub 2:15, 16).

▣ **“oo qalbigiisa ka xidha”** waa fal ah wakhti tegay oo wax loo tiirinayo. Erayadani waxa ay tusinayaan dareenka isu naxariisashada xagga Cibraaniga iyadoo macno ahaan ah “gudaha.” Markale ayaa waxa ay tani tusinaysaa camalladeena oo aan ku muujin karno Aabbaha.

▣ **“jacaylka Ilaah”** markale middani ma noqon kartaa mid macnayaal dhowra yeelan karta?

1. Jacaylka Ilaah
2. Jacaylka Ilaah inaga inoo qabo
3. Labadaba.

Ka saddexaad ayaa ku habboona qoraallada Yooxanaa!

3:18 “yaynaan ku jeclaanin hadalka iyo afka toona” waxqabdku waxa uu ku hadlaa cod ka sarreeya hadalka (Matayos 7:24; Yacquub 1:22-25; 2:14-26).

▣ **“laakiin camalka iyo runta”** waxa inaga yaabinaya erayga “run.” Waxa loo malayn karaa inay la mid tahay “camalka,” sida “wax falista” oo kale. Waxay u muuqataa erayga in loogala jeedo runta (NJB) ama xaqiiqo (TEV), sida adeegsiga “fariin” ee 1:5 iyo 3:11, taasi oo isugu jirta caqiido iyo qaab nololeed, sida ay tahay “run” oo kale. Camalka iyo ujeedadu waxay isugu jiraan jacayl bixin (jacaylka Ilaah), mana aha jacayl tusinaya waxsiin oo keliya.

3:19 “Oo taasaynu ku garan doonnaa” hadalkani waxa uu tilmaamayaa ficilka jacaylka ee aan hore kusoo aragnay. Garashadani waxa ay caddayn kale u tahay is beddelka ku imanaya Masiixiga runta ah.

▣ **“inaynu kuwa runta nahay”** qaab nololeedka rumaystayaashu waxa uu muujinayaa labo waxyaalood: (1) inay xaqa ku taagan yihiin iyo (2) in damiirkoodu uu yahay saafi. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 6:55.

3:19-20 waxa adag sida qoraalka Giriigga ee aayadahan loo tarjumay. Mid ka mida fasiraaduhu waxa uu adkaynayaa xukunka Ilaah, halka kuwo kalena ka sheegayaan naxariista Ilaah. Waxay haddaba u muuqataa macnuhu inuu toosinayo arrinta labaad oo ah ta ugu habboona.

3:20-21 waa labo weedh shuruudood oo heerka saddexaad ah.

3:20

NASB “wax alla wixii qalbigeenu inagu eedeeyo”

NKJV “qalbigeenu wuu ina xukumaa”

NRSV “markastoo qalbigeenu ina xukumo”

TEV “damiirkeenu wuu ina xukumaa”

NJB “xitaa haddii dareenkeenna ina xukumo”

Dhammaan rumaystayaasha waxa ay khibrad u yeeshen murugadu gudaha iyaga oon ku noolayn “heerka” ay u maleeyeen inuu yahay doorashada Ilaah ee noloshooda (Rooma 7). Xanuunka damiirku waxa uu ka iman karaa Ruuxa Ilaah (si towbad keen ay u sababto) ama Shaydaanka (si ay u sababto Burburka shakhsi ahaaneed waxaanay sabaysaa lumitaanka markhaatiga Masiixiyadda). Waxa jira dareen denbi oo habboona iyo midkaloona habboonayn, oo rumaystayaashuna waxa ay awoodayaan inay kala saaraan labadan waxyaalood iyadoo akhriyaya erayga Ilaah ama dhegaysanaya. Yooxanaa waxa uu isku dayayaa inuu la taliyo rumaystayaasha ku nool jacaylka, laakiinse loollanka kula jira denbigu (denbi gelista iyo dareen u yeelasho la’aanta). Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 12:40.

▣ **“oo wax walbaba wuu og yahay.”** Ilaah waxa uu ogsoonyahay ujeedooyinkeenna runta ah (1 Samuu’eel 2:7; 16:7; 1 Boqorradii 8:39; 1 Taariikhadii 28:9; 2 Taariikhadii 6:30; Sabuurka 7:9; 44:21; Maahmaayadii 15:11; 20:27; 21:2; Yeremyaah 11:20; 17:9-10; 20:12; Luukos 16:15; Falimaha Rasuullada 1:24; 15:8; Rooma 8:26, 27).

3:21 “haddii aan qalbigeenu ina eedayn” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah. rumaystayaashu waxa ay la loollamayaan denbiga iyo nafta (2:1; 5:16-17), waxaanay waajahayaan jarribaadaha iyagoo markaasna si aan habboonayn ula macaamalaya xaalado gaar ah, hadiyo goorna waxay dareemaan in damiirkoodu uu xukumayo. Mid kamida digriga Methodist ga ayaa leh:

“Rabbiyow, qofna kuma raaxaysato raaxo buuxda,
Waayo qofna denbiga xor kama aha;
Dhammaan kuwa daalaana sida ugu fiican ayay kuugu adeegayaan
Kuwaasina waxay dareemayaan damiirka oo khaldan.”

Garashada Injiilka iyo weheshiga Ciise iyo isu dhiibista Ruuxa Quduuska iyo Aabbuhu waxa weeyi awoodda iyo garashada buuxda ee qalbiyadeenna siinaysa kalsooni iyo raaxo (Sabuurka 103:8-14)!

▣ **“kalsoonaan ayaynu ku leennahay xagga Ilaah”** tani waxa ay ka hadlaysaa dhexgalista joogitaanka Ilaah, waana mid hadiyo goor Yooxanaa uu kusoo celcelinayo (2:28; 3:21; 4:17; 5:14; Cibraaniyada 3:6; 10:35, eeg Mawduuca Gaarka ah 2:28). Erayadani waxa ay inoo faa’idaynasaa labo faa’iido oo badbaadada ah:

1. Rumaystayaashu waxay Ilaah ku hor leeyihiin kalsooni buuxda
2. Waxay Isaga ka helayaan.

3:22 “Oo wax kastoo aynu ka barinno waynu ka helnaa” waa falka wakhti xaadirka jooga ee la garanayo. Aayaddani waxay ka tarjumaysaa hadalka Ciise ee ku sugan Matayos 7:7; 18:19, Yooxanaa 9:31; 14:13-14; 15:7, 16; 16:23; Markos 11:24; Luukos 11:9-10. Ballan qaadyadan kitaabiga ahi waxa ay ku kala duwan yihiin tijaabinta baryada rumaystaha. Waxay umuuqataa aayaddani aqbalitaanka salaad aan xad lahayn, sidaasi darteedna waxa lagama maarmaan ah in daraasad lagu sameeyo mawduucan isaga ah, si loo helo dheelli tir fiqi ahaaneed.

MAWDUUC GAAR AH: TUKASHADA AAN XADAYSAN BALSE XADAYSAN

A. Injiillada kalse

1. Rumaystayaasha oo lagu dhiiri gelinayo inay salaadda sii wadaan maxaa yeelay Ilaah waxa uu bixyaa “waxa wanaagsan” (Matayos) ama “Ruuxiisa” (Luukos) Matayos 7:7-11; Luukos 11:5-13.
2. Kaniisadda edbinteeda waxa ka mida in rumaystayaashu tukashada ku midoobaan (Matayos 18:19).
3. Macnaha xukumista Yuhuudda rumaystayaasha ahi waa inay isaga rumaysad ku baryaan iyagoon ka shakiyaynin (Matayos 21:22; Markos 11:23-24).
4. Macnaha labo masaal oo ka mida masaalladii Ciise (aayadaha 1-8, xukunka aan xaqa ahayn iyo aayadaha 9-14, Farrisiinta iyo denbiilaha), rumaystayaashuna waa inay u dhaqmaan si ka duwan xaakinka aan cibaadada lahayn iyo Farriisiinta isla saxsan. Ilaah waxa uu maqlaa baryada towbad keenaha (Luukos 18:1-14).

B. Qoraallada Yooxanaa

1. Macnaha ka muuqanaya ninkii indhaha la’aa ee Ciise bogsiyay, waxa lagu muujiyay indha la’aanta runta ah ee Farrisiinta. Waxa la aqbalay baryadii Ciise maxaa yeelay isagu Ilaahbuu garanayay sida ku sugan (Yooxanaa 9:31).
2. Wada sheekaysigii Qolladda Sare (Yooxanaa 13-17)
 - a. 14:12-14 – qaabka salaadda la rumaysan yahay
 - 1) ku tukanayaan rumaystayaashu
 - 2) Magaca Ciise ku baryistiisa
 - 3) Doonista in Aabbaha lagu ammaanoo
 - 4) Dhowrista amarada (aayadda 15)
 - b. 15:7-10 – qaabka salaadda rumaystayaasha
 - 1) Ku dhex jirista Ciise
 - 2) Eraygiisa oo iyaga ku dhex jira
 - 3) Doonista waxa Aabbaha ammaanaya
 - 4) Soo saarista midho
 - 5) Dhowrista amarada (aayadda 10)
 - c. 15:15-17 – qaabka salaadda rumaystayaasha
 - 1) Doorashadooda
 - 2) Midho soo saaristooda
 - 3) Ku waydiisashada magaca Ciise

- 4) Dhowriska amarka is jeclaanshaha
- d. 16:23-24 – qaabka salaadda rumaystayaasha
 - 1) Ku waydiisashada magaca Ciise
 - 2) Doonista in farxaddu dhammays tiranto
- 3. Yooxanaa waraaqdiisa koobaad (1 Yooxanaa)
 - a. 3:22-24 – Qaabka salaadda rumaystayaasha
 - 1) Dhowrista amarradiisa (aayadaha 22,24)
 - 2) Qaab nololeedka habboona
 - 3) Rumaysashada Ciise
 - 4) Is jeclaanshaha
 - 5) Inagoo ku dhexjirna iyo isagoo inagu dhex jira
 - 6) Haysashada hadiyadda Ruuxa
 - b. 5:14-16 – Qaabka salaadda rumaystayaasha
 - 1) Ku kalsoonaanshaha Ilaah
 - 2) Ku socoshada doonistiisa
 - 3) Rumaystayaasha oo isu tukanaya.

C. Yacquub

- 1. 1:5-7 – Rumaystayaashu waxay waajahayaan jarribaado kala duwan waxaana laga rabaa xikmad iyo shaki la'aan.
- 2. 4:2-3 – Rumaystayaashu waa inay ujeedooyin habboona u tukadaan
- 3. 5:13-18 – Rumaystayaasha ay haysato dhibaatooyin caafimaad waxa lagu dhiirri gelinayaa
 - a. Wadaadda waa inay waydiistaan in Ilaah loo baryo
 - b. Waa inay ku tukadaan in rumaysadku uu badbaadinayo
 - c. Waa inay waydiistaan in denbiyadoo laga cafiyo
 - d. Waa inay isu qirtaan denbiyadooda oo isu tukadaan (la mida 1 Yooxanaa 5:16).

Furaha salaadda wax ku oolka ahi waa la midnimada Masiixa, taasina waa midda loogala jeedo ku baryista magaca Ciise. Waxa ugu xun ee Ilaah samayn karaa waa isagoo aqbala salaaddeena ku waajahan waxa inaga nafteenu rabto oo ay sameeyaan dad badan oo Masiixiyiin ahi. Macno ahaan salaadda oo dhamaa waa mid la aqbali karo, waxa ugu qaalisan ee salaadda rumaystuhuna waa inuu Ilaah la qaato wakhti isaga oo ku kasloon Ilaah.

▣ **“maxaa yeelay, qaynuunnadiisa ayaynu xajinnaa, oo waxaynu falnaa waxa isaga ka farxiya”** u fiiro labada shuruuduud ee salaadda muhiimka u ah:

- 1. Addeecitaan
- 2. Samaynta waxyaalaha Ilaah raalli gelinaya (Yooxanaa 8:29).

1 Yooxanaa waxa weeyi kitaab ku saabsan noloshu Masiixiyadda iyo adeegga wax ku oolka ah.

NASB (UPDATED) TEXT: 3:23-24

²³Oo kanu waa qaynuunkiisa, kaasoo ah inaynu rumaysanno magaca Wiilkiisa Ciise Masiix ah, oo aynu isjeclaanno, siduu qaynuunka inoo siiyey. ²⁴Oo kii xajiya qaynuunnadiisa, wuu ku sii jiraa isaga, isaguna wuu ku sii jiraa. Oo saasaynu ku garanaynaa inuu isagu inagu sii jiro xagga Ruuxa uu ina siiyey.

3:23 “kanu waa qaynuunkiisa, kaasoo..inay rumaysano.. oo aynu is jeclaanno” u fiiro erayga “qaynuun” isaga oo ah keli watana laba dhinac. Midda koobaad waa rumaysad shakhsi ahaaneed; falka ah “rumaysano” waa fal tegay (Yooxanaa 6:29, 40). Midda labaadna waa qaab nololeed; falka jacayl, waa fal jooga (3:11; 4:7). Injiiku waa farriin la rumaysto, qof la aqbalo, iyo qaab nololeed lagu noolaado.

▣ **“inaynu rumaysanno magaca Wiilkiisa Ciise Masiix”** fahanka ah “rumaysano” waxa uu asaas u yahay fahanka rumaysadka kitaabiga ah. Erayga Axdiga Hore ee ah *aman* waxa uu tusinayaa “kalsooni” iyo “addeecitaan” (eeg Mawduuca Gaarka ah 1 Yooxanaa 2:10). Erayga Axdiga Cusub ee Giriigga ah (*pisteuō*) waxa

loo tarjumay rumays, rumaysad, ama isku hallayn (eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 2:33). Halkan waxa lagaga hadlayaa waa rumaysashada Ilaah. aadanaha leexdayna waa inay ku kalsoonaadaan runta Ilaah iyagoo rumaysanaya muujintiisa, ballan qaadyadiisa, iyo aasaaska aan la dhaqaajin karin.

Fahanka rumaysashada “magacu” marka la eego Bariga waxa uu ka tarjumayaa in magacu uu ka tarjumayo qofkaas.

1. Ciise, Matayos 1:21, 23, 25; 2:22; 10:22; 12:21; 18:5, 20; 19:29; 24:5, 9; Yooxanaa 1:12; 2:23; 3:18; 14:26; 15:21; 17:6; 20:31
2. Aabbaha, Matayos 6:9; 21:9; 23:29; Yooxanaa 5:43; 10:25; 12:13; 17:12
3. Saddexmidnimada, Matayos 28:19.

T. Robertson ayaa kitaabkiisa *Word Pictures in the New Testament* (p. 228), waxa uu ku sheegayaa wax ku saabsan aayaddan oo la xidhiidha qoraal gacmeedyada Giriigga, marka la eego falka “rumaysano.” Qoraal gacmeedyada B, K, iyo L waxa ay dhigayaan fal tegay, haka x, A, iyo C ay ka dhigayaan fal jooga. Labadubana marka la eego macnaha way ku habboon yihiin qaabka Yooxanaa.

3:24 “kii xajiya..kusii jiraa..” waa labo fal oo wakhti xaadirka jooga. Addeecitaanku waxa uu la xidhiidhaa kusii jirista, jacaylkuna waa caddaynta in Ilaah inagu dhex jiro (4:12, 15-16; Yooxanaa 14:23; 15:10). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:10.

▣ **“xagga Ruuxa uu ina siiyey”** Yooxanaa waxa uu adeegsanayaa caddaymo gaar ah si uu u xadido rumaystayaasha dhabta ah (Rooma 4:13; 8:14-16, eeg Fahanka Macnaha Guud ee 2:3-27, C). labo waxa ay la xidhiidhaan Ruuxa Quduuska ah.

1. In la qiro Ciise (Rooma 10:9-13; 1 Korintos 12:3)
2. Noloshaha ah la midnimada Masiixa (Yooxanaa 15; Galatiya 5:22; Yacquub 2:14-26).

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagaso aragnay cutubkan.

1. Muxuu yahay mawduuca ay isku midka ku yihiin aayadaha 11-24? (Yooxanaa 2:7-11)?
2. Sharrax xidhiidhka ka dhexeeya aayadaha 16 iyo 17. Sidee la isu barbardhigi karaa nafeheena oon u bixino kuwa kale dartood iyo caawinta walaalka baahan?
3. Aayadaha 19-20 ma waxa ay xoojinayaan xukunka Ilaah mise naxariistiisa dejinaysa cabsideenna?
4. Sideen isugu xidhi karnaa hadalka Yooxanaa ee ku saabsan salaadda sida ka muuqata aayadda 22 iyo khibraddeen maalinlaha ah?
5. Sideed la isu waafajin karaa iska hor imaanshaha waxa la xidhiidha qirashada denbiga iyo ka towbad keenkiisa iyo quduusnaanka amaba joogis la’aanta denbiga?
6. Muxuu Yooxanaa aad ugu cecelinayaa oo u adkaynayaa muhiimadda ku jirta qaab nololeedka?
7. Sharraxaad ka bixi xaqiiqooyinka fiqi ahaaneed ee sheegaya qofka oo dhalasho cusub dhasha.
8. Sidee qaybtani ula xidhiidhaa nolol maalmeedka Masiixiyadda?

I YOOXANAA 4

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ruuxa Ilaah iyo ruuxa Masiix diidaha	Ruuxa runta iyo ruuxa khaladka 3:24-4:6	Aqoonsashada runta iyo khaladka	Ruuxa runta ah iyo ruuxa beenta ah	Shuruudda Saddexaad: iska ilaalinta kuwa Masiixa diida iyo dunida
4:1-6		4:1-6	4:1-3 4:4-6	4:1-6 Meesha uu ka yimaaddo jacaylka iyo rumaysadku (4:7-5:13)
Ilaah waa jacayl	Ilaah oo jacayl lagu garto	Barakada jacaylka	Ilaah waa jacayl	Jacaylku meeshuu ka yimaaddo
4:7-12	4:7-11 Ilaah oo lagu arko jacayl 4:12-16	4:7-12	4:7-10 4:11-12	4:7-5:4
4:13-16a		4:13-16a	4:13-16a	
4:16b-21	Adeegsiga jacaylka 4:17-19 Rumaysad ku addeecista 4:20-5:5	4:16b-21	4:16b-18 4:19-21	

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

FAHANKA MACNAHA GUUD EE 4:1-21

- A. Cutubka afraad waxa uu koobsanayaa qaab suugaaneed ku kooban sida ay rumaystayaasha uga hortegi karaan kuwa sheeganaya inay Ilaah u hadlayaan ee beenta ah. qaybtanina waxa ay la xidhiidhaa:
 1. Macallimiinta ama nebiyada beenta ah ee kasoo horjeeda Masiixa (2:18-25).

2. Kuwa isku dayay inay khayaano la yimaaddaan (2:26; 3:7).
3. Kuwa sheegtay inay leeyihiin garashada xaqiiqooyinka ruuxiga ah (3:24).

Si loo fahmo dhibaataadii soo food saaraysay Masiixiyiintii hore, waa inaan u fiirsano kuwo badan oo sheeganaya inay Ilaah u hadlayaan (1 Korintos 12:10; 14:29; 1 Tesaloniika 5:20-21; 1 Yooxanaa 4:1-6). Iyadoo qoraalka Axdiga Cusubi aanu wakhtigaas dhammays tirnayn ayaa waxa jiray kala duwanaansho ahaa xagga caqiidada iyo ruuxa oo bulshada dhex yaallay (Yacquub 3:1-12).

- B. Waxa adag in la qayb qayb loo jaro I Yooxanaa sababtuna waa mawduucyo badan oo isu eeg isla markaana soo noqnoqonaya isna dhex galaya, tanina sidoo kale waxay ka muuqanaysaa cutubka 4. Waxay u muuqataa cutubkani inuu adkaynayo xaqiiqooyin hore loogu soo sheegay cutubyada hore, gaar ahaana is jeclaanshaha rumaystayaasha (aayadaha 7-21; 2:7-12 iyo 3:11-24).

- C. Yooxanaa waxa uu wax u qorayaa si looga hortago macallimiinta beenta ah iyo si loo dhiirri geliyo rumaystayaasha iyadoo la adeegsanayo dhowr tijaabooyin:

1. Tijaabinta caqiido ahaaneed (rumaysashada Ciise, 1 Yooxanaa 2:18-25; 4:1-6, 14-16; 5:1, 5, 10).
2. Tijaabinta nolol ahaaneed (addecitaanka, 1 Yooxanaa 2:3-7; 3:1-10, 22-24).
3. Tijaabinta bulsho ahaaneed (jacayl, 1 Yooxanaa 2:7-11; 3:11-18; 4:7-12, 16-21; 5:1-2).

Qaybo ka mida Qorniinku waxa uu la xidhiidhaa noocyo dhowra oo ah macallimiinta beenta ah, haddaba 1 Yooxanaa waxa ay waajahaysaa bidcadii Gonostigga iyo macallimiintoodii beenta ahaa. Eeg hordhaca I Yooxanaa, bidcada. Qaybo kale oo iyaguna ka mid ah Axdiga Cusub ayaa waajahaya beenaalayaal kale (Yooxanaa 1:13; Rooma 10:9-13; 1 Korintos 12:3). Waa inaan dirasad ku samayno macne kasta iyo waxa uu gudbinayo si aan isaga ilaalino bidcoolayaasha. Waxa jiray khaladaad badan oo ka imanayay

1. Yuhuuddii sheeganayay inay sharciga haystaan.
2. Faylasuufyadii Giriigga.
3. Giriiggii kasoo horjeeday sharciga Yuhuudda.
4. Kuwii sheeganayay inay helaana waxyi gaara oo ka yimid Ilaah.

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 4:1-6

¹Gacaliyayaalow, ha rumaysanina ruux walba, laakiin ruuxyada tijaabiya si aad u habsataan inay kuwa Ilaah yihiin; waayo, nebiyo badan oo been ah ayaa u soo baxay dunida. ²Taasaad ku garanaysaan Ruuxa Ilaah; ruux walba oo qirta in Ciise Masiix jidh ku yimid, waa ku Ilaah. ³Oo ruux walba oo aan qiran Ciise Masiix ku Ilaah ma aha; oo kanuna waa ruuxa kan Masiixa ka geesta ah oo aad maqasheen inuu imanayo, imminkana duniduu ku jiraa. ⁴Carruurtiyey, kuwa Ilaah baad tihiin, oo iyagaad ka adkaateen; maxaa yeelay, Ka idinku jira ayaa ka weyn ka dunida ku jira. ⁵Iyagu waa kuwa dunida; oo taas aawadeed waxay ka hadlaan waxa dunida, oo duniduna way maqashaa. ⁶Innaguna kuwa Ilaah baynu nahay; ka Ilaah yaqaan waa ina maqlaa; oo ka aan kan Ilaah ahayna inama maqla. Taasaynu ku garanaynaa ruuxa runta ah iyo ruuxa qaladka ah.

4:1 “ha rumaysanina” waa fal amar ah oo ay la socoto diidmo isla markaana tilmaamaya joojinta wax hore u socday. Rumaystayaashu waxa ay u janjeedhsadaan aqbalista shakhsiyadaha hadalkooda iyo dooddoodu xooggan tahay, isla markaasna sameeya waxyaalaha cajiibka ah ee loo malaynayo inay ka yimaaddeen xagga Ilaah. Macallimiinta beenta ahi waxay sheeganayeen (1) inay u hadlayaan Ilaah ama (2) inay helaan muujin gaara oo Ilaah xaggiisa ka timid.

MAWDUUC GAAR AH: MASIIXIYIINTU MA IS XUKUMI KARAAN?

Arrintan waa in labo siyaabood loola tacaalo.

1. Masiixiyiinta waxa looga digay in midkoodba kan kale xukumo (Matayos 7:1-5; Luukos 6:37,42; Rooma 2:1-11; Yacquub 4:11-12).
2. Sidoo kalena Masiixiyiinta waxa looga digay inay qiimayn ku sameeyaan oo xukumaan hogaamiyayaasha (Matayos 7:6,15-16; 1 Korintos 14:29; 1 Tesaloniika 5:21; 1 Timoteyos 3:1-13; iyo 1 Yooxanaa 4:1-6).

Waxa jira qiimaynta kuwo ka mida oo habboon waxtarna leh

1. Qiimayntu ujeedadeedu waa inay noqoto ansixin (1 Yooxanaa 4:1 – “tijaabo” lagu arki karo ansixinta).
2. Qiimaynta waa in lagu sameeyo is hoosaysiin iyo wanaag (Galatiya 6:1)
3. Qiimayntu waa inaanay ahaan mid diiradda saaraysa shakhsiyad ahaan waxa la xidhiidha (Rooma 14:1-23; 1 Korintos 8:1-13; 10:23-33).
4. Qiimayntu waa inay tahay mid magacaabaysa hoggaamiyayaasha aan laga dhaleecaynayn kaniisadda amaba bulshada dhexdeeda (1 Timoteyos 3).

▣ **“ruux walba”** ruux macnaha halkan loogu adeegsaday waxa weeyi dadka. Eeg fiirada 4:6. Tanina waxa ay sheegaysaa farriinta la sheeganayo inay ka timid Ilaah. Bidcadu waxa ay kasoo baxdaa kaniisadda dhexdeeda (2:19). Macallimiinta beenta ahi waxay sheegteen inay ku hadlayaan afka Ilaah, sidaasi darteedna Yooxanaa waxa uu sheegayaa inay jiraan labo meelood uu waxyaalaha ruuxiga ahi ka yimaaddaan, waana Ilaah ama Shaydaanka.

▣ **“laakiin ruuxyada tijaabiya”** waa ficil amar oo wakhti xaadirka jooga. Tijaabinta ruuxyadu waa hadiyad ruuxi ah (1 Korintos 12:10; 14:29), waxaanay lagama maarmaan ugu tahay rumaystayaasha sida sallaaddu lagama maarmaanka u tahay oo kale. Erayga Giriigga ah ee *dokmazō* waxa ay tilmaamayaa “in wax la tijaabiyo si loo qaato.” Rumaystayaashana waxa laga rabaa inay ku fikiraan waxa wanaagsan inta aan xumaanta la caddaynin (1 Korintos 13:4-7; 1 Tesaloniika 5:20-21).

MAWDUUC GAAR AH: ERAYADA GIRIIGGA EE “TIJAABINTA”

Waxa jira labo eray ooo Giriik ah isla markaasna loo adeegsado tijaabinta qof ujeeddo laga leeyahay

1. *Dokimazō, dokimion, dokimasia*

Waxa loo adeegsadaa qofka sida ay maskaxdiisu tahay. haddaba nidaamka jidh ahaaneed ee tijaabinta ayaa noqday mid awood leh oo ay adeegsadaan Ilaah iyo aadanuhuba, waxaanay ku tijaabiyaan kuwa kale. Waxa markaas loo adeegsaday eraygan aragtida ku waajahan aqbalitaanka waxaas:

- a. dibi, Luukos 14:19
- b. innaga nafehenna, 1 Korintos 11:28
- c. rumaysadkeenna, Yacquub 1:3
- d. xitaa Ilaah, Cibraaniyada 3:9

Natiijooyinka kasoo baxa tijaabooyinkan ayaa waxay u muuqdeen kuwo sax ah (Rooma 1:28; 14:22; 16:10; 2 Korintos 10:18; 13:3; Filiboy 2:27; 1 Butros 1:7). Haddaba, fikraddani waxay gudbinaysaa in qof la itixaamo oo kaddibna la ogaado.

- a. fiicnaanta
- b. wanaagga
- c. caqli badan
- d. qiimo leh
- e. faa’ido leh

2. *peirazō, peirasmōs*

Waxa weeyi in qof la itixaamo iyadoo la aqbalayo amaba la diidayo. Waxaana loo adeegsaday iyadoo lala xidhiidhinayo Ciise aqbalitaankiisa amaba diidmadiisa.

- a. Waxay gudbinaysaa jarribaadda Ciise (Matayos 4:1; 16:1; 19:3; 22:18,35; Markos 1:13; Luukos 4:2; 10:25; Cibraaniyada 2:18).
- b. Eraygan (*peirazō*) waxa loo adeegsaday magac ahaan Shaydaanka sida aan ka arki karno Matayos 4:3; 1 Tesaloniika 3:5.
- c. Waxay ka kooban tahay lakab waxaana loo adeegsaday Ciise oon jarribin Ilaah (Matayos 4:7; Luukos 4:12; sidoo kale eeg 1 Korintos 10:9). Waxa loo adeegsaday jarribaadaha Masiixiyiinta dhexdooda (1 Korintos 7:5; 10:9, 13; Galatiya 6:1; 1 Tesaloniika 3:5; Cibraaniyada 2:18; Yacquub 1:2,13,14; 1 Butros 4:12; 2 Butros 2:9). Ilaah waxa uu ogolyahay saddexda cadow ee aadanaha (dunida, jidhka, iyo sharka) si uu u muujiyo wakhti iyo meel gaar ah.

▣ **“waayo, nebiyo badan oo been ah ayaa u soo baxay dunida.”** Waa fal ebyan oo ku dhisan wax la garanayo tusmayna xambaarsan (Yeremyaah 14:14; 23:21; 29:8; Matayos 7:15; 24:11, 24; Falimaha Rasuullada 20:28-30; 2 Butros 2:1; 1 Yooxanaa 2:18-19, 24; 3:7; 2 Yooxanaa 7). Aayaddani waxa ay tusinaysaa in nebiyadaasi ay ka tegeen kaniisadda (kaniisado guriyeedyo), iyagoo markaasna sheeganaya inay ku hadlayaan magaca Ilaah.

Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 4:19.

4:2 “Taasaad ku garanaysaan Ruuxa Ilaah” qaabkan naxwe ahaaneed waxa uu noqon karaa fal jooga wakhti xaadirka tusmayna sida (hadal) ama fal amar ah oo wakhti xaadirka jooga lana garanayo (amar). Waxaanay la mid tahay qaabka “ku dhexjiris” 2:27 iyo “garasho,” 2:29. Ruuxa Quduuska ahi hadiyo goor waxa uu ammaanaa Ciise (Yooxanaa 14:26; 15:26; 16:13-15). Tijaabintan mid la mid ahna waxa aan ka arki karnaa qoraallada Bawlos sida ku sugan 1 Korintos 12:3.

▣ **“ruux walba oo qirta”** waa fal wakhti xaadirka jooga oo wax tusmaynaya isla markaana sheegaya shaqo soconaysaa, kaasi oon ahayn qirashada hore ee rumaysadka oo keliya. Erayga Giriigga ah ee “qirasho” waxa uu ka kooban yahay “la mida” iyo “hadlis,” oo macneheedu yahay “dhihista wax la mida.” Mawduucani waxa uu kusoo noqnoqonayaa 1 Yooxanaa (1 Yooxanaa 1:9; 2:23; 4:2-3; 4:15; Yooxanaa 9:22; 2 Yooxanaa 7). Erayganina waxa uu faa’idaynayaa qirasho aan qarsoodi ku jirin lana maqlayo iyadoo markaasna lagu dhegganaanayo injiilka Ciise Masiix. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 9:22.

▣ **“in Ciise Masiix jidh ku yimid, waa ku Ilaah”** Waa fal ebyan oo ku dhisan wax la garanayo. Kani waa imtixaan caqiido ahaaneed oo asaas u ah macallimiinta beenta ah (Gonostigga) kuwaasi oo Kitaabkani ku saabsan yahay. Tijaabintani waxa ay ku dhisantahay in Ciise yahay aadane dhammays tiran (jidh, kaasoo ay diideen Gonostiggu) iyo Ilaah dhammays tiran (1:1-4; 2 Yooxanaa 7; Yooxanaa 1:14; 1 Timoteyos 3:16). Wakhtiga dhammayska tirani waxa uu tusinayaa in aadanenimada Ciise aanay ahayn mid wakhti ku salaysan, laakiinse ay tahay mid daa’imis ah.

4:3 “ruux walba oo aan qiran Ciise” waxa xiiso leh fiqi ahaan iyada oo nuqulka Laatiinka ah ee Axdiga Cusub iyo qoraaladii wadaaddada kaniisaduhu, sida Clement, Origin kii Aleksandariya, Irenaeus, iyo Tertulian ay koobsanayaan *leui* (looses), taasi macneheedu yahay “ka soocnaanta Ciise,” ay tusinayso wixii Gonostigu aaminsanaayeen ee ahayd kala soocista ruuxda aadanaha iyo ta ilaahiga ah ee Ciise. Qoraalkani waxa uu ka tarjumayaa loollanka dhexyaallay kaniisaddii hore (eeg Bart Erhart, kitaabkiisa *The Orthodox Corruption of Scripture*, pp. 125-135).

▣ **“ruuxa kan Masiixa ka geesta ah”** ereyadan waxa loo adeegsaday kuwa diida Masiixa (2:18-25), mana aha iyadoo la isku dayayo in la isticmaalo booskiisa.

▣ **“oo aad maqasheen inuu imanayo, imminkana duniduu ku jiraa.”** Waa fal ebyan oo tumsayn sida. Hore ayaa Yooxanaa uu iyaga mawduucan ula falaqeyay, laakiinse muhiimadda mawduuca waa asaasi. Sida ku sugan 2:18 aayaddani waxa ay kasoo horjeeddaa kuwa Masiixa geesta ka ah ee yimid ama iman doona. Macallimiintaas Gonostiggu waxa ay hadiyo goor keenayeen macluumaad beenta oo dadka luminaya iyo qaab nololeed lunsan oo kasoo bilaabmaya Bilowgii 3, ilaa dhammaadka wakhtiga Masiixa ka gees noqoshadiisa (2 Tesaloniika 2; Muujintii 13).

4:4-6 “idinku...iyagu...innagu” dhammaanba magac u yaalladani waa kuwo aad loo adkaynayo. Waxa jirta saddex qolo oo laga hadlay

1. Rumaystayaasha dhabta ah (Yooxanaa iyo akhristayaashiisa)
2. Rumaystayaasha beenta ah (macallimiinta Gonostigga iyo kuwa raaca)
3. Yooxanaa kooxdiiisii la adeegaysay ama koox fiqi ahaaneed.

Noocan oo kale waxa laga helayaa Cibraaniyada 6 iyo 10.

4:4 “iyagaad ka adkaateen” fal ebyan oo ku dhisan garasho isla markaana war sida. Waxay u muuqataa in halkan lagu tilmaamayo murankii caqiido ahaaneed iyo nolosha Masiixiyadda, waana erayo cajiib leh oo iyaga dhiirri gelinaya.

Yooxanaa waxa uu danaynayaa nolosha Masiixiyiinta iyo guushooda ay ka guulaysanayaan denbiga iyo sharka. Waxa uu adeegsanayaa erayga (*nikaō*) 6 jeer isagoo ku dhex adeegsanaya 1 Yooxanaa (2:13, 14; 4:4; 5:4, 5), iyo 11 jeer Muujintii dhexdeeda, iyo hal mar oo ah Injiilka (16:33). Eraygan “guul” waxa hal mar lagu adeegsaday Luukos (11:22) iyo labo jeer oo qoraallada Bawlos lagu adeegsaday (Rooma 3:4; 12:21).

▣ **“maxaa yeelay, Ka idinku jira ayaa ka weyn ka dunida ku jira”** waxa ay adkaynasaa joogitaanka Ilaahnimada, waxaanay u muuqataa in halkan lagu sheegayo Aabbaha (Yooxanaa 14:23; 2 Korintos 6:16). Axdiga Cusubi waxa uu xoojinayaa (1) joogitaanka Wiilka (Matayos 28:20; Kolosay 1:27) iyo (2) joogitaanka Ruuxa Quduuska ah (Rooma 8:9; 1 Yooxanaa 4:13). Waxa aan arki karnaa aayado badan oo isla xidhiidhinaya Wiilka iyo Ruuxa (Rooma 8:9; 2 Korintos 3:17; Galatiya 4:6; Filiboy 1:19; 1 Butros 1:11). Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 14:15.

Erayada ah “ka dunida ku jira” waxa ay sheegaysaa Shaydaanka (Yooxanaa 12:31; 14:30; 16:11; 2 Korintos 4:4; Efesos 2:2; 1 Yooxanaa 5:19) iyo kuwa isaga raaca. Erayga ah “duni” ee ku sugan 1 Yooxanaa hadiyo jeer waxa ay tusinaysaa diidmo (aadanaha ka geesta ah Ilaah, eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 14:17).

4:5 “Iyagu waa kuwa dunida” erayga “duni” waxa halkan loogu adeegsanayaa aadanaha leexday ee isku dayaya inuu dhergiyo baahiyihiisa iyaga oo ka gaara Ilaah (2:15-17). Waxa ay tilmaamaysaa ruuxa aadanaha ee leexday ee ka gaarka ah Ilaah, waxaana middaas tusaale loogu soo qaadan karaa Qaabiil (3:12). Tusaalayaasha dhinaca kale waxa noqon kara (1) Eliyaas iyo nebiyadii *Ba’al* (1 Boqorradii 18) iyo (2) Yeremyaah iyo Xanaaniyaah (Yeremyaah 28).

▣ **“duniduna way maqashaa”** waa caddayn kale oo ay iskaga soo horjeedaan macallimiinta Masiixiyiinta ah iyo kuwa beenta ah ee qaar dhegaystaan (Yooxanaa 15:19; 1 Timoteyos 4:1).

4:6 “ka Ilaah yaqaan waa ina maqlaa” waa magaca fal sameeyaha jooga ee la garanayo. Rumaystayaasha dhabta ahi waxa ay kusii soconayaan dhegaysiga iyo rumaysad ku jawaaba celinta. Rumaystayashu waxa ay kala saari karaan wacdiyayaasha ama macallimiinta iyagoo taas ku garanaya waxa ay koobasanayso farriintoodu iyo cidda ay dhegaysanaysaan una jawaabayaan.

▣ **“Taasaynu ku garanaynaa ruuxa runta ah iyo ruuxa qaladka ah”** middani waxa ay tilmaamaysaa Ruuxa Quduuska ah (Yooxanaa 14:17; 15:26; 16:13; 1 Yooxanaa 4:6; 5:7) iyo ruuxa sharka ah ee Shaydaanka. Rumaystayaasha waa inay gaartaan farriintu meeshay ka imanayso, waayo marar badan ayaa la sheegtaa in lagu hadlayo afka Ilaah. farriini waxa ay tahay mid loo yeelayo Masiixa oo ku baaqaysa ku dayashadiisa, halka ta kalena ay tahay mid dadku iska samaystaan.

Robert Girdlestone, ayaa kitaabkiisa *Synonyms of the Old Testament*, waxa uu falaqayn fiican kaga bixinayaa adeegsiga erayga “ruux” ee Axdiga Cusub dhexdiisa.

1. Ruuxyada sharka
2. Ruuxda aadanaha
3. Ruuxa Quduuska ah
4. Waxyaalo uu Ruuxu ku soo saaro ruuxda aadanaha
 - a. ‘ruuxda addoonsiga oo ay kasoo horjeeddo ruuxda korsigu’ – Rooma 8:15
 - b. ‘ruuxda qabow’ – 1 Korintos 4:21
 - c. ‘ruuxa rumaysadka’ – 2 Korintos 4:13
 - d. ‘ruuxa xikmadda iyo muujinta garashadiisa’ Efesos 1:17
 - e. ‘maaha ruuxda fashilaadda, laakiinse waa ruuxa awoodda iyo jacaylka’ – 2 Timoteyos 1:7
 - f. ‘ruuxda baadida oo ay kasoo horjeeddo ruuxda runt’ – 1 Yooxanaa 4:6 (pp. 61-63).”

NASB (UPDATED) TEXT: 4:7-14

⁷Gacaliyayaalow, aynu isjeclaanno; waayo, Ilaah baa leh jacaylka; oo mid walba oo jecel, wuxuu ka dhashay Ilaah, Ilaah buuna yaqaan. ⁸Oo ka aan jeclaynina Ilaah ma yaqaan; waayo, Ilaah waa jacayl.

⁹Ilaah baa Wiilkiisa keliya oo dhashay dunida u soo diray si aynu ugu noolaanno isaga, oo taasaa jacaylka Ilaah laynoogu muujiyey. ¹⁰Oo taas jacayl baa ku jira, mana aha inaynu Ilaah jeclayn, laakiinse isagaa ina jeclaaday, oo wuxuu Wiilkiisa u soo diray si uu kafaarogudka dembiyadeenna u noqdo. ¹¹Gacaliyayaalow, haddii Ilaah sidaa inoo jeclaaday, waa inaynu isjeclaanno. ¹²Cidina Ilaah ma arkin marnaba. Haddii aynu isjeclaanno, Ilaah wuu inagu jiraa, oo jacaylkiisu wuu inagu dhan yahay. ¹³Ruuxiisuu ina siiyey oo taasaynu ku garanaynaa inaynu ku sii jirno isaga, isaguna inagu sii jiro. ¹⁴Innagu waynu aragnay oo waxaynu markhaati u furaynaa in Aabbuhu Wiilka soo diray si uu Badbaadiyaha dunida u noqdo.

1
4:7 “aynu isjeclaanno” waa fal wakhti xaadirka jooga oo wax loo tirinayo. Is jeclaanshaha maalinlaha ahi waxa uu muujinayaa nolosha rumaystayaasha ee weheshiga ku dhisan (1 Korintos 13; Galatiya 5:22). Mawduucani waxa uu in badan kusoo noqnoqonayaa qoraallada Yooxanaa iyo tijaabinta akhlaaq ahaaneed (Yooxanaa 13:34; 15:12, 17; 1 Yooxanaa 2:7-11; 3:11, 23; 2 Yooxanaa 5, eeg fahanka macnaha guud, C). Qaabka nisbaynta ahina waxa uu tilmaamayaa xaalad deg deg ah.

▣ **“waayo, Ilaah baa leh jacaylka”** meesha jacaylku ka yimaaddaa waa Ilaah mana aha caadifadda ama naxariista dadka (aayadda 16). Jacaylkani maaha dareen oo kaliya laakiinse waa camal ujeedo laga leeyahay oo xadaysan (Aabbuhu wuxuu Wiilka usoo diray inuu inaga darteen u dhinto, aayadda 10; Yooxanaa 3:16).

▣ **“oo mid walba oo jecel, wuxuu ka dhashay Ilaah, Ilaah buuna yaqaan”** waa fal ebyan oo wax tusmaynaya. Yooxanaa waxa uu door bidayaa dhalashada la taaban karo marka uu ka hadlyo rumaysadka (2:29; 3:9; 5:1; 4:18; Yooxanaa 3:3, 7, 31; 19:11). Erayga “garasho” macnaheeda Cibraaniga waxa ay tusinaysaa is weheshiga dhow (Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5). Waxa uu Yooxanaa adeegsanayaa eraygan in ka badan 77 jeer marka la eego 1 Yooxanaa. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 1:10.

4:8 “Oo ka aan jeclaynina Ilaah ma yaqaan; waayo, Ilaah waa jacayl.” Jacaylka nolol maalmeed laha ahi waxa weeyi imitxaanka runta ah ee lagu garan karo Ilaah. erayada ah “Ilaah waa jacayl” waxa ay la mid tahay “Ilaah waa nuur” (1:5) iyo “Ilaah waa ruux” (Yooxanaa 4:24). Sida ugu wanaagsan ee laug garan karo jacaylka Ilaah iyo cadhadiisa waa iyadoo la is barbar dhigo Sharciga Kunoqoshadiisa 5:9 iyo 5:10 iyo 7:9.

4:9 “oo taasaa jacaylka Ilaah laynoogu muujiyey” waa fal dhacay wakhti tegay oo tusmayn wada (Yooxanaa 3:16; 2 Korintos 9:15; Rooma 8:32). Ilaah jacaylkiisa uu inoo qabo waxa uu inoogu muujiyay isaga oo inoo soo diray Wiilkiisa si uu ingaga denbiyadeenna uugu dhinto. Jacaylku waa ficil oo mana aha dareen oo keliya, rumaystayaashana waxa laga rabaa in middani ay ka muuqato nolol maalmoodkooda (1 Yooxanaa 3:16). In Ilaah aan garannaa waa in aan jeclaanno sida isaguba inoo jecelyahay.

▣ **“Ilaah baa Wiilkiisa keliya oo dhashay dunida u soo diray”** waa fal ebyan ah oo tusmayn wada isla markaasna tilmaamaya sugnaanshaha jidh soo qaadashada iyo natiijadiisa. Barakada Ilaah oo dhammi waxa ay inoogu imanaysaa Masiixa.

Erayga “keliya” waa *monogenēs*, taasi oo tusinaysa “gaar” nooca ah, isaga oo aan ku dhalan galmo ay aadanuhu isu galmoodaan. Ciise kuma uu dhalan iyada oo galmo ay dhex martay Ilaah iyo Maryantii bikirka ahayd. Yooxanaa ereyadan dhowr jeer ayuu adeegsanayaa (Yooxanaa 1:14, 18; 3:16, 18; 1 Yooxanaa 4:9). Eeg fiirada Yooxanaa 3:16. Ciise waa Wiilka Ilaah isagoo gaar ah, sidoo kalena rumaystayaashu waa carruurtii Ilaah.

▣ **“si aynu ugu noolaanno isaga”** waa fal dhacay wakhti tegay oo tusinaya xaalad. Ku jawaab celinta rumaysadku waa lagama maarmaan. Ujeedada jidh soo qaadashaduna waxay ahayd si aadanaha loo siiyo nolosha weligeed ah (Yooxanaa 10:10).

4:10 “Oo taas jacayl baa ku jira” jacaylka Ilaah waxa uu ku muuqday nolosha Ciise iyo dhimashadiisa (Rooma 5:6, 8). In Ciise la gartaana waa iyadoo Ilaah la gartay, iyadoo Ilaah la gartaana waa iyadoo la jeclaado.

▣ **“mana aha inaynu Ilaah jeclayn”** Axdiga Cusubi waxa uu gaar ka yahay diimaha dunida ka jira oo dhan. Halka dadku ay ka raadinayaan Ilaah, Masiixiyaddu waxa ay tusinaysaa Ilaah oo raadinaya aadanaha. Xaqiiqadana maaha inaga oo Ilaah jecel, balse isaga ayaa ina jecel. Ilaah waxa uu ina raadiyay inaga oo denbiyadeenna ku jirna oo caasinay.

Waxa jira kala duwanaansho la xidhiidha qaabka falka.

1. Jacayl haya oo jeclaanshahana kusii soconaya, fal ebyan – MS B.

2. Jeclaaday, fal tegay – MS 8.

UBS⁴ ku waxa uu kusoo qaadanayaa isaga oo ah fal ebyan “B” isagoo ku tirinaya (hubaal).

▣ **“oo wuxuu Wiilkiisa u soo diray si uu kafaarogudka dembiyadeenna u noqdo.”** Eeg fiirada 2:2.

4:11 “haddii” waa weedh shuruudeed heerka koobaad ah iyadoo xagga qoraaga ka ah sax ama uu uga socdo ujeedo suugaan ahaaneed. Ilaah si run ah ayuu inoo jecelyahay (Rooma 8:31).

▣ **“Ilaah sidaa inoo jeclaaday”** waxa loogala jeedaa “sidan ayaa jacaylkiisu yahay” sida ku sugan Yooxanaa 3:16.

▣ **“waa inaynu isjeclaanno.”** Waxa lagama maarmaan ah inaan is jeclaanno (2:6; 3:16; 4:1). Tani waxa ay tilmaamaysaa waxyaalaha kharriban ee ay ku tallaabsadeen macallimiinta beenta ahi.

4:12 “Cidina Ilaah ma arkin marnaba” waa fal ebyan oo tusmayn sida. Eraydani waxa ay tilmaamayaan aragtida ama eegista wax (Baxniintii 33:20-23; Yooxanaa 1:18; 5:37; 6:46; 1 Timoteyos 6:16). Waxa suurta gala macallimiinta Gonostigga inay saamayeen diimuhii barigu iyagoo sheeganaya inay Ilaah arkeen ama uu riyo ugu muuqday. Ciise waxa uu u yimid si uu u muujiyo Aabbaha inagoo isaga u fiirsana ayaanan ku garan karnaa Ilaah.

▣ **“haddii”** waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah oo faa’idaynasa arrin dhicitaankeeda la filan karo.

▣ **“Ilaah wuu inagu jiraa,”** eeg Mawduuca Gaarka ah 2:10.

▣ **“oo jacaylkiisu wuu inagu dhan yahay.”** Waa magaca fal sameeyaha buuxa een la garanayn. Masiixiyiinta muujinaya jacaylku waxa ay caddayn u yihiin ku dhex jirista jacaylka Ilaah ee buuxa (2:5; 4:17).

4:13 “Ruuxiisuu ina siiyey” waa fal ebyan oo ku dhisan wax la garanayo tusmayna sida. Deganaanshaha Ruuxa Quduusku (3:24; Rooma 8:9) iyo saamayntiisa wax bedelaysaa waxa ay caddayn u tahay badbaadada (Rooma 8:16). Waxay u muuqataa aayadda 13 inay markhaati u tahay Ruuxa halka aayadda 14 ay Rasuullada uga markhaati furayso. Saddexmidnimadu waxa ay si cad uga muuqanaysaa aayadaha 13 iyo 14. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 14:26.

4:14 “Innagu waynu aragnay oo waxaynu markhaati u furaynaa” waa labo fal oo ebyan ah tusmayna sida iyagoo la xidhiidha ficil wakhti xaadirka jooga oo ku dhisan wax la garanayo. Aayaddani waxa ay sifaynasaa markhaati furka Yooxanaa isagoo ah markhaati goob jooge ah oo arkay Ciise, sida ku sugan 1:1-3 oo kale. erayga ah “aragnay” waxa weeyi midda lagu adeegsaday aayadda 12. Eeg Mawduuca Gaarka ah, Yooxanaa 1:8.

▣ **“in Aabbuhu Wiilka soo diray”** waa fal ebyan oo tusmayn sida. Xaqiiqada ah Aabbaha oo Wiilka usoo diray dunidu (Yooxanaa 3:16), waxa ay kasoo horjeeddaa waxbarista Gonostiga ee beenta ah kuna saabsan ruuxda oo ka kooban ruux (wanaag) iyo maaddada (shar). Ciise waxa uu yahay Ilaah buuxa waxaana loo soo diray si uu denbiyadeenna inooga kor qaado (Rooma 8:18-25) iyadoo taasi ah habaarkii Bilowgii 3 (Galatiya 3:13).

▣ **“si uu Badbaadiyaha dunida u noqdo”** xaqiiqada ku jirta Ciise oo Aabbuhu u doortay inuu noqdo badbaadiyaha waxa ay burinaysaa waxbarista beenta ah ee Gonostigga oo sheegaya in si gaara lagu helayo badbaadada. Waxa ay sheeganayeen in farqiga u dhexeeya Ilaah Sare iyo ka hoose oo dunida ka abuuray maaddo.

Erayada ah “badbaadiyaha dunidu” waxa uu ahaa (1) magac loo bixiyo sanamyada (tusaale ahaan Zeus) iyo (2) magac guud oo boqorka Roomaanka ee Kaysar uu lahaa. Marka loo eego Masiixiyiinta waxa magacaas u

xanbaarsanaa Ciise (Yooxanaa 4:42; 1 Timoteyos 2:4; 4:10), taasina waa middii keentay in Kaysarradii Roomaanku ay cadaadiyaan Masiixiyiintii ku sugnaa Aasiyada Yar.

U fiirso Ciise oo ah dhammaanba badbaadiyaha dunida (oon ahayn badh ka mida dunida) waana haddii dadku ay taas ka jawaab celiyaan (Yooxanaa 1:12; 3:16; Rooma 5:18; 10:9-13).

NASB (UPDATED) TEXT: 4:15-21

¹⁵Ku alla kii qirta inuu Ciise yahay Wiilka Ilaah, Ilaah baa ku sii jira isaga, isaguna wuu ku sii jiraa Ilaah. ¹⁶Oo innaguna waan garanaynaa oo waan rumaysan nahay jacaylka Ilaah inoo qabo. Ilaah waa jacayl; oo kii ku sii jiraa jacaylka, Ilaah buu ku sii jiraa. Ilaahna isaguu ku sii jiraa. ¹⁷Taasaa jacaylku kaamil inoogu noqday si aynu kalsoonaan u lahaanno maalinta xisaabta; maxaa yeelay, siduu isagu yahay ayaynu innaguna dunidan ku nahay. ¹⁸Jacaylku baqdin ma leh, laakiin jacaylka kaamilka ahi baqdinta dibadduu u saaraa, waayo, baqintu cigaab bay leedahay. Oo kii baqaana kaamil kuma noqdo jacaylka. ¹⁹Waynu jecel nahay isaga, waayo, isagaa hore inoo jeclaaday. ²⁰Haddii qof yidhaahdo, Ilaah waan jeclahay, oo uu walaalkiis neceb yahay, waa beenaaleh, maxaa yeelay, kan aan jeclayn walaalkii uu arko sidee buu u jeclaan karaa Ilaaha uusan arag? ²¹Oo waxaynu isaga ka haysannaa qaynuunkan, kaas oo ah, Kii Ilaah jecel, walaalkiina ha jeclaado.

4:15 “Ku alla kii qirta inuu Ciise yahay Wiilka Ilaah” waa fal dhacay wakhti tegay oo la garanayo. Wax ku saabsan “qirasho” ka eeg fiirada aayadda 2. Mid ka mida saddexda imtixaan ee lagu garan karo Masiixiga runta ah isla markaana Yooxanaa sheegayo ayaa waxa ay fiqi ahaan la xidhiidhaa shakhsiyadda Ciise iyo adeeggiisa (2:22-23; 4:1-6; 5:1, 5). Tani waxa ay waafaqaysaa waxa kusoo arooray kitaabka Yacquub, waana marka laga eego xagga qaab nololeedka iyo addeecitaanka. Masiixiyaddu waxay isugu jirtaa shakhsi, run, iyo qaab nololeed. Eeg Fahanka Macnaha Guud, C.

Erayga ah “ku alla” waxa uu tilmaamayaa baaqa Ilaah ee wayn una ahaaday qofkasta. Ilaah aadanaha waxa uu ka abuuray ekaanshihiisa (Bilowgii 1:26-27; 5:3; 9:6), waxaanu Ilaah ballan qaaday inuu badbaadin doono aadanaha sida ku sugan Bilowgii 3:15. Yeedhitaankiisii uu yeedhay Ibraahimna waxa ay ahayd si uu u gaadho dunida oo dhan (Bilowgii 12:3; Baxniintii 19:5). Ciise waxa uu daweeeyay dhibaataadii la xidhiidhay denbiga isagoo taasna ku sameeyay dhimashadiisa (Yooxanaa 3:16). Haddaba ku kasta oo raba inuu ku jawaab celiyo towbad keen iyo rumaysad iyo addeecitaan albaabku wuu u furan yahay. Ilaahna dadka oo dhan waxa uu ku leeyahay “kaalaya” (Ishacyaah 55).

MAWDUUC GAAR AH: WACDINTA BOOBKA

Qofka akhriyayow waa inaan kuu qirto in wacdintaydu aanay ahayn mid ku tiirsan madaahib gooni ah, laakiinse waa wacdinta injiilka (Matayos 28:18-20; Luukos 24:46-47; Falimaha Rasuullada 1:8). Waxa aan rumaysanahay in Ilaah uu badbaadada aadanaha u lahaa qorshe weligiis ah (Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5-6; Yereyaaah 31:31-34; Yexesqeel 18:36:22-39; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28; 13:29; Rooma 3:9-18,19-20,21-32), kuwaas oo uu ka abuuray ekaanshihiisa (Bilowgii 1:26-27). Axdiyaduna waxa ay ku midoobeen Masiixa (Galatiya 3:28-29; Kolosay 3:11). Ciisena waxa uu yahay Ilaah oo qarsoonaa balse imika is muujiyay (Efesos 2:11-3:13)!

Tani waa fahan hore oo ku sugan fasiraadaha Qorniinanada (Yoonis). Waxaan ka wada akhriyay dhammaanba qoraalladooda! Waa mid hubaashii fasilayaasha oo dhammi xiiseeyaan, laakiin Qorniin ahaan waxa lagasoo qaaday run.

☐ **“Ilaah baa ku sii jira isaga, isaguna wuu ku sii jiraa Ilaah”** aayaddani waxa ay muujinaysaa xidhiidhka axdiga ah ee ka dhexeeya Ilaah iyo aadanaha. Ilaah hadiyo goor isaga ayaa wax bilaaba isaga ayaana dhigay axdiga, sidaasi darteedna aadanuhu waa inay ka jawaab celiyaan.

Ku dhex jiristu waa axdi, laakiinse waa ballan qaad cajiib ah. Bal ka fikir Ilaah wayn ee wax walba abuuray oo ah Quduuska Israa’iil, isaga oo dhex jooga aadanaha leexday (Yooxanaa 14:23). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:10.

4:16 “Oo innaguna waan garanaynaa oo waan rumaysan nahay” waa labo fal oo ebyan ah waxna tusmaynaya. Aasaaska xidhiidhka ka dhexeeya rumaystayaasha iyo Ilaah waxa weeyi yaqiinta ku sugan jacaylka Ilaah ee ku dhex sugan Masiixa, mana aha noloshooda. Eeg Mawduuca Gaarka ah 5:13.

▣ **“jacaylka Ilaah inoo qabo”** waxa ay sheegaysaa jacaylka daa’imiska ah ee Ilaah.

▣ **“Ilaah waa jacayl”** waxa ay la mid tahay (aayadda 8).

4:17 “Taasaa jacaylku kaamil inoogu noqday” waxa weeyi qaabka erayga Giriigga ee *telos* (aayadda 12). Waxa ayna tilmaamaysaa dhammaystir, qaan gaadhimo, iyo buuxnaansho mana aha denbi la’aan.

▣ **“inoogu”** magac u yaalkan (*meta*) waxa loo fahmi karaa sida “inaga” (TEV, NJB), “dhexdeenna” (NKJV, NRSV, NIV, REB), ama “inala jira” (NASB).

▣ **“si aynu kalsoonaan u lahaanno”** hadalkani asal ahaan waxa weeyi xorriyatul qowlka. Yooxanaa marar badan ayuu adeegsanayaa middan (2:28; 3:21; 5:14). Macnaha ay markaas kasloonidu faa’idaynasaa waxa weeyi u dhowaanshaha Ilaah (Cibraaniyada 3:6; 10:35). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:28.

▣ **“maalinta xisaabta; maxaa yeelay, siduu isagu yahay ayaynu innaguna dunidan ku nahay.”** Rumaystayaasha waa inay is jeclaadaan sida Ciiseba u jeclaaday (3:16; 4:11). Inkasta oo la silcinayo oo la caydhinayo sidii Masiixaba loo silciyay, haddana waxa la jooga Aabbaha iyo Ruuxa Quduuska ah isagoo xoojinaya dhiirri gelayana. Maalin maalmaha ka mida ayaa Ilaah xisaabin doonaa dadka (Matayos 25:31-46; 2 Korintos 5:10; Muujintii 20:11-15). Rumaystayaasha maalintaa qiyaamaha dushooda may ahaanin wax casbsi ahi.

4:18 “Jacaylku baqdin ma leh” marka aan Ilaah u garano inuu yahay Aabbeheen ka cabsan mayno. Badanaa kuwa rumaysan Masiixiyaddu waxay middaas u samaynayaan iyagoo cabsanaya ama ka cabsanaya naar, laakiinse waxa wanaagsan in waxa ku dhammaada cabsidu aanu ku dhammaan cabsi.

▣ **“baqdintu ciqaab bay leedahay”** eraygan waxa lagu adeegsaday halkan iyo Matayos 25:46 (qaabka falka ku sugan 2 Butros 2:9), waxaanay la xidhiidhaa aakhiro. Falka wakhti xaadirka joogaa waxa uu sheegayaa cabsida Ilaah oo joogta (wakhtigan) iyo mustaqbal (dhammaadka wakhtiga). Ilaah aadanaha waxa uu ka abuuray ekaanshihiisa (Bilowgii 1:26-27) taasi oo koobsanaysa garasho iyo doorasho iyo natiijadooda. Dunidani waxa ay ku dhisantahay akhlaaq, marka dadku ay jebiyaan amarada Ilaahna iyaguna waa ay jabayaan.

4:19 “Waynu jecel nahay” waa fal wakhti xaadirka jooga oo wax tusmaynaya. NKJV gu waxa uu raacinayaa mafcuul ka danbeeya “waynu jecelnahay.” Qoraal gacmeedyadu waxa ay tusinayaan:

1. Qoraal gacmeedka Giriigga (κ) “Ilaah” (*ton theon*)
2. Sida ku sugan Ψ “isaga” ayuu dhigayaa (KJV)
3. Vulgate “midba midka kale” ayuu dhigayaa.

Mafcuulka ama cidda falku ku dhacay waxa laga yaabaa in mar danbe lagu daray. UBS⁴ ku waxa uu falka ku dhigayaa “A” isagoo ku tirinaya (hubaal).

▣ **“waayo, isagaa hore inoo jeclaaday”** aayaddani waxa ay adkaynasaa waxa kusoo arooray aayadda 10. Ilaah hadiyo goor isaga wax bilaaba (Yooxanaa 6:44, 65) laakiinse aadanaha leexday waa inuu k jawaab celiyo (Yooxanaa 1:12; 3:16). Rumaystayaashu kalsoonidooda waa inay dhigaan Ilaah, maxaa yeelay Ilaaha Saddexmidnimadu waa rajada isaga ayaana badbaadiyay aadanaha.

4:20 “Haddii qof yidhaahdo” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah oo faa’idaynasa arrin la filayo dhicitaankeeda. Waxa tusaale kale ay u tahay Yooxanaa oo wax kasoo xiganaya macallimiinta beenta ahi waxa ay sheegayaan si uu ujeedadiisa uga hadlo (1:6, 8, 10; 2:4, 6). Qaab suugaaneedkan meelo kale ayaa lagu adeegsaday (Malaakii, Rooma, iyo Yacquub).

▣ **“Ilaah waan jeclahay, oo uu walaalkiis neceb yahay”** qaab nololeedkeenna uu ku dheehan yahay jacaylku waxa uu muujinayaa jacayka Masiixiyadda (Markos 12:28-34). Khilaafku wuu dhici karaa laakiinse maaha inuu sii waaro. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 4:4.

▣ **“waa beenaaleh, ”** Yooxanaa rumaystayaal dhowra ayuu ku tilmaamayaa beenaalayaal (2:4, 22; 4:20). Yooxanaa waxa uu sheegayaa in kuwa beenta wax ku wacdiyaa ay ka dhigayaan Ilaah beenaale (1:6, 10; 5:10). Hubaashii waa khiyaanoolayaal isku sheegaya inay diin leeyihiin.

4:21 aayaddani waxa ay soo koobaysaa cutubka afraad. Jacaylku waa caddayn run aan ka madhanayn rumaystaha dhabta ah. nacaybkana waa caddaynta qofka sharlowga ah. Macallimiinta beenta ahi kuwo badan ayay ku sababeen khilaaf iyo loollan.

▣ **“walaalkiina”** erayga ah “walaal” waxa loogala jeedaa rumaystaha Masiixiga ah ama qof kasta, sidaasi darteedna adeegsiga Yooxanaa ee soo noqnoqonayaa waxa uu tusinayaa in loogala jeedo walaalaha rumaystayaasha ah (1 Timoteyos 4:10).

SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Tiri tijaabooyinka ugu muhiimsan ee lagu garan karo Masiixiyadda asalka ah.
2. Sideen ku garan karnaa ka ku hadlayay magaca Ilaah?
3. Maxay yihiin labada meelood ee xaqu ka yimaaddo?
4. Maxay tahay muhiimadda magaca “badbaadiyaha dunidu”?
5. Tiri ficillada soo ban dhigaya beenta (rumaystayaasha aan runta ahayn).

1 YOOXANAA 5

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Rumaysadku waa guusha dunida	Ku addeecitaanka rumaysadka 4:20-5:5	Rumaysadka guulaysta	Ka guulaysigeenna dunida	
5:1-5		5:1-5	5:1-5	Rumaysadku halkuu ka yimaaddo
Markhaatifurista khusaysa Wiilka	Hubaalnimada Ilaah markhaatigiisa		Markhaatifurka ku saabsan Masiixa	5:5-13
5:6-12	5:6-13	5:6-12	5:6-12	
Garashada nolosha weligeed ah		Gebogebada	Nolosha weligeed ah	
5:13-15	Kalsoonida iyo naxariista ku jirta tukashada	5:13	5:13-15	U tukashada denbiilayaaha
	5:14-17	5:14-17		5:14-17
5:16-17	Garashada runta iyo diidista beenta		5:16-17	Soo koobitaanka warqadda
5:18-21	5:18-21	5:18-20	5:18	5:18-21
			5:19	
			5:20	
		5:21	5:21	

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 5:1-4

¹Ku alla kii rumaysta inuu Ciise yahay Masiixa, Ilaah buu ka dhashay; oo ku alla kii jecel kan dhalay, kan isaga ka dhashayna wuu jecel yahay. ²Taasaynu ku garanaynaa inaynu carruurta Ilaah jecel nahay, goortaynu Ilaah jeclaanno oo qaynuunnadiisa xajinno. ³Waa kan jacaylka Ilaah, kaasoo ah inaynu

5:1 “ku alla” (labo jeer). Erayga *pas* waxa la adeegsaday isagoo soo noqnoqonaya 1 Yooxanaa dhexdiisa (1 Yooxanaa 2:29; 3:3, 4, 6 [labo jeer] 9, 10; 4:7; 5:1). Yooxanaa si cad ayaa uu wax u kala saarayaa. Qofwalbana waxa lagu casuumayaa inuu aqbalu Ciise (Yooxanaa 1:12; 3:16; 1 Timoteyos 2:4; 2 Butros 3:9). Waxa ay la mid tahay casuumitaanka Bawlos ee ku sugan Rooma 10:9-13.

▣ **“rumaysta”** waa magaca fal sameeyaha la garanayo. Waa erayga Giriigga ah (Magac – *pistis*; fal - *pisteuō*) kaasi oo loo tarjumi karo “rumays,” ama “isku hallayn.” Hadiyo goorna waxa lagu isticmaalay I Yooxanaa iyo Warqadaha kale (I iyo II Timoteyos iyo Tiitos) iyada oo tilmaamaysa waxa caqiidadu koobsanayso (Yuudas aayadaha 3, 20). Injiillada iyo waraaqaha Bawlosna waxa ay ku tusinaysaa kalsoonida shakhsi ahaaneed iyo u hoggaansanaanta. Injiilku wuxuu isugu jiraa xaqiiqooyin aan rumaysanayno iyo shakhsi aanu ku kalsoonaanayno, inaga oo ku noolaanayna nolol ku dhisan adeegitaan iyo addeecitaan. Waxa sidanna adkaynaya 1 Yooxanaa iyo Yacquub. Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 2:23.

▣ **“inuu Ciise yahay Masiixa,”** bidcada macallimiinta beenta ahi waxa ay ku saabsanayd shakhsiyadda Ciise iyo inuu aadane yahay, isagoo sidoo kalena Ilaah ah (aayadda 5). Ciisihii reer Naasereet waxa uu ahaa Masiixii la ballan qaaday. Masiixu waxa la yaab ahayd (Axdiga Hore) inuu sidoo kale Ilaah yahay. Erayadani waxa ay ahaayeen axdi, waxaana suurta gala marka la samaynayo baabtiiska (2:22), iyadoo laraacinayo “Wiilka Ilaah” (4:15; 5:5). Waxa hubaala in sheegista Masiixu ay la xidhiidhay Axdiga Hore (Yuhuudda, iyo waxyaalihii Ilaah sii sheegay).

▣ **“Ilaah buu ka dhashay”** waa fal ebyan oo ku dhisan wax aan la garanayn tusmayna wada. Waxa uu adkaynayaa waxa ku dhammays tirmay adeeg dibadda ka yimid (Ilaah, aayadaha 4, 18; 2:29).



NASB “kan isaga ka dhashayna wuu jecel yahay”
NKJV “waxa uu jecelyahay kan isaga ka dhashay”
NRSV “ka waalidka jeceli ilmihisana wuu jecelyahay”
TEV “ka Aabbaha jeceli ilmihisana wuu jecelyahay”
NJB “Kan Aabbaha jeceli Wiilkana wuu jecelyahay”

Waxa loo badanayaa in erayadani ay tilmaamayaan jacaylka Ciise maxaa yeelay adeegsiga (1) kelida; (2) ficilka wakhtiga tegay ah; iyo (3) bidcoolayaasha oo isku dayay inay kala saaraan Ciise iyo Aabbaha. Si kastaba ha ahaatee, erayadu waxa ay la xidhiidhaan mawduuca soo noqnoqonaya ee la xidhiidha is jeclaansheheenna (aayadda 2).

5:2 aayaddan iyo aayadda 3 waxa ay kusoo celcelinayaan mowduucyada ugu muhiimsan ee ay uu xambaarsan yahay 1 Yooxanaa. Jacayl, Jacaylka Ilaah, oo lagu sheegay jacayl soconaya (2:7-11; 4:7-21) iyo addeecitaan (aayadda 2). Fiiro u yeelo caddaymaha rumaystaha dhabta ah.

1. Waxa uu jecelyahay Ilaah
2. Waxa uu jecelyahay ilmaha Ilaah (aayadda 1)
3. Waxa uu jecelyahay carruurta Ilaah (aayadda 2)
4. Wuu addeecaa (aayadaha 2, 3)
5. Waxbuuna qaalib ka noqdaa (aayadda 4-5)

5:3 “Waa kan jacaylka Ilaah, kaasoo ah inaynu qaynuunnadiisa xajinno” jacaylkani maaha mid dareen keliya ah laakiin waa ficil inuu ka muuqdo. Addeecitaanku waxa uu yahay mid aad muhiim u ah (2:3-4; 3:22, 24; Yooxanaa 14:15, 21, 23; 15:10; 2 Yooxanaa 6; Muujintii 12:17; 14:12).

▣ **“oo qaynuunnadiisuna ma cusla”** axdiga cusubi waxa uu koobsanayaa masuuliyado dhowr ah (Matayos 11:29-30, halkaasoo Ciise uu ku isticmaalayo erayga “yoke”; rabbiska ayaana u isticmaalay sharciyadii Muuse, Matayos 23:4). Addeecitaanka qaynuunadani waxa ay ka imanaysaa xidhiidhka aan la leenahay Ilaah laakiinse qaynuunnadani maaha waxa aasaaska u ah xidhiidhka ku dhisan nimcada Ilaah ee aanay mutaysan aadanuhu (Efesos 2:8-9, 10). Waxbarista Ciise waxa ay ka duwatahay tan bidcoolayaasha ee ku sifowday kasoo horjeedshada akhlaaqda ama qaynuunnada. Waa inaan qirto aniga oo markasta oo aan Ilaah dartiis ugu adeego dadka anigoo ogaada inaan fahmayo labadan waxyaalood. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Yooxanaa 12:50.

5:4

NASB, NKJV, NRSV

“Ku alla kii ka dhashay Ilaah”

TEV, NJB

“waxa uu noqdaa ilmaha Ilaah”

Qoraalka Giriigga ee erayga “ku alla” (*pas*) ayaa ugu horreeya hadalka sida aayadda 1. Sidoo kale kelinimada (*pan*) ayaa la adeegsaday iyadoo loo tarjumay “ku alla.” Si kastaba ha ahaatee, macnuhu waxa uu la xidhiidhaa shakhsi, maxaa yeelay waxa ay la socotaa “ka dhashay.” Waxa weeyi ka aaminsan in Ciise uu ka dhashay xagga Ilaah isagoo dunida ka adkaaday (4:4; 2:13, 14).

▣ **“wuxuu ka adkaadaa dunida”** “ka adkaadaa” waa falka wakhti xaadirka jooga oo la garanayo tusmayntana xanbraasan ee *nikaō*(2:13, 14; 4:4; 5:4, 5). Middanoo kale waxa labo jeer lagu adeegsaday aayadda 4

1. Magaca, “guul,” *nikē*
2. Falka tegay *nikaō* “ka adkaaday”

Ciise waxax uu ka adkaaday dunida (falka ebyan ee wax tusinaya, Yooxanaa 16:33), maadaamo oo Masiixiyiintu ay isaga ku midoobaanna waxa ay helayaan awoodda ay kaga adkaanayaan dunida (2:13-14; 4:4). Erayga “duni” halkan waxa loogala jeedaa “aadanaha ka geesta ah Ilaah.” fikirka ka geesnoqoshanimadu waa calaamadaha lagu garan karo aadanaha leexday (Bilowgii 3). Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 14:17.

▣ **“libta”** tani waa qaabka magaca Giriigga ah ee (*nikos*) ee falka “ka adkaadaa.” Dhammaadka aayadda 4 ayaa falka tegay midkan la midka ah lagu adeegsaday, sidoo kalena aayadda 5 waxa uu ugu soo aroorayaa isaga oo ah magaca fal sameeyaha *nikos*. Rumaystayaasha waxa ay dunida kaga guulaysanayaan Masiixa. erayga “nike” ee lagu adeegsado qalabka sida kabaha, cayaaruhu waxa uu ka yimid magaca Ilaah Giriigga ahaa ee guusha.

▣ **“rumaysadkeenna”** waa meesha keliya ee loogu adeegsaday qaabka magac ahaanta “rumays” (*pistis*) marka la eego qoraallada Yooxanaa oo dhan! Waxa laga yaabaa Yooxanaa inuu ka warwarsanaa xagjirmimada lagagasii fogaanayo “fiqiga saxda ah” marka loo eego nolol maalmeedka ku dhisan la midnimada Masiixa. Ficilka (*pisteuō*) in badan ayuu adeegsanayaa Yooxanaa. Rumaysadkeenu waxa uu keenayaa guusha maxaa yeelay

1. Waxa ay la xidhiidhaa guusha Ciise
 2. Waxa ay la xidhiidhaa xidhiidhkeena Cusub een la leenahay Ilaah
 3. Waxa ay la xidhiidhaa awoodda ku dhexjirista Ruuxa Quduuska ah
- Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 1:7; 2:23; iyo 1 Yooxanaa 2:10.

NASB (UPDATED) TEXT: 5:5-12

⁵Waa ayo kan dunida ka adkaadaa, kan rumaystaa inuu Ciise yahay Wiilka Ilaah mooyaane? ⁶Kanu waa kii biyo iyo dhiig ku yimid, oo ah Ciise Masiix; biyo keliya kuma iman, laakiin wuxuu ku yimid biyo iyo dhiig. ⁷Oo waa Ruuxa kan maragga furaa, waayo, Ruuxa waa runta. ⁸Waxaa jira saddex marag fura; waana Ruuxa iyo biyaha iyo dhiigga, oo saddexdaasuna waa isku mid. ⁹Haddii aynu maragfurka dadka aqbali lahayn, maragfurka Ilaah baa ka weyn, waayo, maragfurka Ilaah waa kan oo ah inuu Wiilkiisa ka marag furay. ¹⁰Ka Wiilka Ilaah rumaystaa maragguu ku haystaa nafsaddiisa, kii aan Ilaah rumaysanna, wuxuu isaga ka dhigay beenaaleh; maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan maraggii uu Ilaah ka marag furay Wiilkiisa. ¹¹Maragguna waa kan, kaas oo ah in Ilaah ina siiyey nolosha weligeed ah, oo ay noloshanu Wiilkiisa ku jirto. ¹²Kan Wiilka haystaa, noloshuu leeyahay. Kii aan Wiilka Ilaah haysanna nolosha ma leh.

5:5 “Ciise yahay Wiilka Ilaah” aayaddani waxa ay tusinaysaa waxyaalaha rumaysadkeenu koobsanayo, taasi oo lagu sheegay aayadda 4. Guusheenu waxay ku xidhantahay inaga oo isku hallayna Ciise, oo ah aadane iyo Ilaah isku jira (4:1-6). Fiiro u yeelo rumaystayaasha oo qira in Ciise yahay (1) Masiixa (aayadda 1); (2) ilmaha Ilaah (aayadda 1); (3) Wiilka Ilaah (aayadaha 5, 10); iyo (4) Nolosha (1:2; 5:20). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:23, kaasi oo diiwaan gelinaya erayada *hoti* ee la xidhiidha falka “rumays.”

▣ **“Wiilka Ilaah”** eeg Mawduuca Gaarka ah 3:8.

5:6 “Kanu waa kii ku yimid” waa magaca fal sameeyaha la garanayo ee tusinaya jidh soo qaadashada Masiixa, isagoo una dhintay kafaaro gud ahaan. Labadan waxyaalood waxa diiddanaa bidcoolayaashii Gonostigga.

▣ **“biyo iyo dhiig”** waxay u muuqataa “biyuhu” inay tusinayaan dhalashadii jidh ahaaneed ee Ciise (Yooxanaa 3:1-9) iyadoo “dhiig” iyana ay tusinaysa dhimashadiisii. Macnuhu waxa uu tusinayaa aadanenimada Ciise oo ay diiddanaayeen bidcoolayaashu.

Ikhtiyaarka kalena waxa uu yahay mid la xidhiidha Gonostigga macallimoontoodii beenta ahayd (Cerinthus) waana in “biyuhu” ay sheegayaa baabtiiskii Ciise. Iyagu waxa ay sheegeen in “ruuxa Masiixu” uu Ciise ku yimid markii la baabtiisayay, isagoo markaasna ka tegay ka hor intaan isku tallaabta lagu qodbin (dhiig, soo koobis fiican ka eeg NASB Study Bible, p. 1835).

Ikhtiyaarka saddexaad waxa uu la xidhiidhaa dhimashadii Ciise. Warankii dhinaca laga geliyay waxa uu ka keenay “dhiig iyo biyo” (Yooxanaa 19:34). Bidcoolayaashu waxa ay kasoo horjeedeen Ciise dhimashadiisa oo keentay dhimasho.

▣ **“Oo waa Ruuxa kan maragga furaa”** doorka Ruuxa Quduuska ahi waxa weeyi muujinta Injiilka. Waa qaybta ka midka ah Saddexmidnimada ee ina tusiya denbiga, isagoo inoo hoggaamiya Masiixa, ku baabtiisa Masiixa, oo Masiixana in lagu daydo sababa (Yooxanaa 16:7-15). Hadiyo goor Ruuxu waxa uu ka markhaati kacaa Masiixa, ee isagu isuma markhaati furo (Yooxanaa 15:26).

▣ **“Ruuxa waa runta”** (Yooxanaa 14:17; 15:26; 16:13; 1 Yooxanaa 4:6). Eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55 iyo 17:3.

5:7 waxa jira xoogaa wareer ku sugan bilowga iyo dhammaadka aayadaha 6, 7, iyo 8. Erayada ah “Aabbaha, Erayga iyo Ruuxa Quduusku” waxay ka maqan yihiin qoraal gacmeedyadii hore ee Giriigga Axdiga Cusub: Alexandrinus (A), Vaticanus (B) ama Sinaiticus (⌘), ama qoyska Byzantine qoraal gacmeedyadooda. Waxa ay ka muuqanaysaa oo keliya afar ka mida qoraal gacmeedyadii danbe.

1. MS 61, oo u noqonaya qarnigii 16 aad.
2. MS 88 oo u noqonaya qarnigii 12 aad, halkaasoo qoraalka gacan kale wax lagu dhex geliyay.
3. MS 629, oo u noqonaya qarnigii 14 aad ama 15 aad.
4. MS 635, oo u noqonaya qarnigii 11 aad iyadoo qoraal gacmeed kale la dhex geliyay.

Ereyadan may soo xiganin aabbayaashii kaniisaduhu iyagoo xitaa kusoo qaadan doodohoodii la xidhiidhay Saddexmidnimada. Sidoo kale waxa ay ka maqantahya qoraal gacmeedyadii Laatiinka (*Sixto - Clementine*). Lagamana heliyo Laatiinkii hore ama Jerome Vulgate kiisa. Waxa ay ka muuqanaysaa qoraalka bidcoolihii Isbaanishka ahaa ee Priscillian, oo dhintay C.D. 385. Waxa soo xiganaya aabbayaashii Laatiinka ee woqooyiga Afrika iyo Talyaaniga qarnigii 5 aad. Ugu yaraanna aayaddani kuma jirto qoraalkii asalka ahaa ee 1 Yooxanaa.

Waxa muhiimad leh hubsashada meesha lagu xoojiyay caqiidada Saddexmidnimada (Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa) mana aha mid saamayn ku leh diidmadeenna aayaddan. In kasta oo erayga “Saddexmidnimo” aanu kusoo arooray Kitaabka, haddana waxa jira aayado la xidhiidha caqiidadan:

1. Baabtiiskii Ciise (Matayos 3:16-17)
2. Amarka wayn (Matayos 28:19)
3. Soo dirista Ruuxa (Yooxanaa 14:26)
4. Butros wacdintiisii Bentakostiga (Falimaha Rasuullada 2:33-34)
5. Ka hadalkii Bawlos ee ruuxda iyo jidhka (Rooma 8:7-10)
6. Bawlos oo ka hadlay hadiyadaha ruuxiga ah (1 Korintos 12:4-6)
7. Qorshayaashii socdaalka ee Bawlos (2 Korintos 1:21-22)
8. Barakadaynta Bawlos (2 Korintos 13:14)

9. Bawlos oo ka hadlay dhammaystirka wakhtiga (Galatiya 4:4-6)
10. Bawlos tukashadiisii uu ku ammaanayay Aabbaha (Efesos 13:14)
11. Bawlos oo ka hadlay ummadaha (Efesos 2:18)
12. Bawlos oo ka hadlay kelinimada Ilaah (Efesos 4:4-6)
13. Bawlos oo ka hadlay naxariista Ilaah (Tiitos 3:4-6)
14. Hordhaca Butros (1 Butros 1:2)

Eeg Mawduuca Gaarka ah Saddexmidnimada Yooxanaa 14:26.

5:8 “Ruuxa iyo biyaha iyo dhiigga, oo saddexdaasuna waa isku mid” Axdiga Hore waxa loo baahan jiray saddex markhaati si wax loo caddeeyo (Sharciga Kunoqoshadiisa 17:6; 19:15). Halkanna waxa aan ku arkaynaa dhacdadii taariikhiga ahayd ee nolosha Ciise inay tahay markhaatiga aadanaha iyo Ilaahnimadiisa buuxda. Aayaddan dhexdeeda, “biyaha” iyo “dhiigga” markale ayaa lagu sheegay iyagoo uu la socdo “Ruuxu.” Erayada “biyo” iyo “dhiig” waxa lagu sheegay aayadda 6, halkana “Ruuxu” waxa laga yaabaa inuu tilmaamayo baabtiiskii Ciise markii qoollaydu kusoo degaysay. Waxa jira is khilaaf u dhexeeya mufasiriinta oo ku saabsan waxa loogala jeedo ereyadan, laakiinse shaki kuma jiro in haddalladani isla xidhiidhaan, iyagoo la xidhiidha diiditaanka macallimiinta Gonostigga ee beenta ahaa kuna saabsanaa aadanenimada Ciise.

5:9 “haddii” waa jumlad shuruudeed heerka koobaad ah oo qoraaga xaggiisa sax ka ah ama la xidhiidha ujeedadiisa suugaan ahaaneed. Shaki kuma jiro in kaniisadiihii Yooxanaa uu wax u qorayay ay ahaayeen kuwo ay rabshayeen bidcoolayaashii Gonostiggu.

▣ **“Haddii aynu maragfurka dadka aqbali lahayn, maragfurka Ilaah baa ka weyn”** markhaatifurka Ilaahiga ahi waxa uu halkan ku tilmaamayaa

1. Markhaati furista Ruuxa Quduuska ah
2. Markhaatifurkii Rasuullada ee ka marag furay noloshii Ciise iyo dhimashadiisii (1:1-3).

▣ **“inuu Wiilkiisa ka marag furay”** waa ficil ebyan oo wax tusmaynaya, isla markaana tusinaya shaqo gaadhay heerkii ugu sarraysay oo sugnaatay. Waxa loogala jeedi karaa middan hadalkii Aabbaha ee markii la baabtiisayay Ciise (Matayos 3:17) ama is beddelkiisii (Matayos 17:5; Yooxanaa 5:32, 37; 8:18) ama waxa ku diiwaan geshan labada Qorniinba (Injiillada). Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 1:8.

5:10 “maragguu ku haystaa nafsaddiisa,” waxa loo fasiri karaa labo siyaabood:

1. Markhaati furka Ruuxa ee ku jira rumaystayaasha (Rooma 8:16)
 2. Runta ku jirta Injiilka (Muujintii 6:10; 12:17; 19:10)
- Eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 1:8.

▣ **“wuxuu isaga ka dhigay beenaaleh”** waa fal ebyan oo wax tusmaynaya. Kuwa Ciise diidaa waxa ay diidaan Ilaah (aayadda 12) maxaa yeelay Ilaah ayay ka dhigaan beenaale.

▣ **“maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan maraggii”** waa fal ebyan oo ku dhisan wax la garanayo, isaga oo tusinaya xaaladda ay ku jiraan kuwa aan rumaysadka lahayni.

5:11-12 “in Ilaah ina siiyey nolosha weligeed ah” waa fal dhacay wakhti tegay oo wax tusmayanaya kana hadlayay shaqo la dhammays tiray (Yooxanaa 3:16). Nolosha weligeed ah waxa lagu qeexay Yooxanaa 17:3. Mararka qaarkood “nolosha weligeed ahi” waxa ay sheegaysaa Ciise laftiisa (1:2; 5:20), meelaha kalena waa hadiyadda laga helo Ilaah (2:25; 5:11; Yooxanaa 10:28), taasi oo lagu helo rumaysashada Masiixa (5:13; Yooxanaa 3:16). Qofna Aabbaha xidhiidh lama yeelan karo isaga oon Wiilka rumaysanin.

NASB (UPDATED) TEXT: 5:13-15

¹³Waxyaalahan waxaan idiinku soo qoray, idinka oo rumaystay magaca Wiilka Ilaah, si aad u ogaataan inaad nolosha weligeed ah leedihiin. ¹⁴Oo tanu waa kalsoonaanta aynu isaga u qabno, taasoo ah haddaynu wax uun doonistiisa ku barinno, isagu wuu ina maqlaa, ¹⁵oo haddaynu og nahay inuu inaga maqlo wax alla wixii aynu ka barinno, waxaynu og nahay inaynu leennahay waxyaalihii aynu isaga ka barinnay.

5:13 “rumaystay magaca” waa fal wakhti xaadirka jooga oo tusinaya rumaysadka sii soconaya. Tami maaha magaca oo si gaara loo adeegsanayo (sida Yuhuuddu ugu saleeyaan magacyada Ilaah oo kale, *Kabbalah*), laakiinse adeegsiga Axdiga Hore waxa weeyi isagoo qofka beddelkiisa ah. eeg Mawduuca Gaarka ah Yooxanaa 2:23.

▣ **“si aad u ogaataan”** waa fal ebyan oo tusinaya wax la garanyo (oida waa ebyan, laakiin waxa loo tarjumay sidii fal wakhti xaadirka jooga). Mawduuca yaqiintu in badan ayuu kusoo noqnoqonayaa I Yooxanaa. Labada eray ee Giriigga ah islana midka ah (*oida* iyo *ginosko*) waxa ay faa’idaynayaan macnaha “garasho.” Waxa muuqata in badh ka mida rumaystayaasha runta ahi ay ku sugan yihiin xaalado gaar ah iyo dhaqamo gaar ahi haddana laga yaabo inaanay garanayn yaqiinta. Aayaddani waxa fiqi ahaan ay u eegtahay soo xidhitaanka Injiilka Yooxanaa (20:31).

Xidhitaanka 1 Yooxanaa (5:13-20) waxa macneheedu uu tusinayaa toddoba waxyaalood oo rumaystayaashu garanayaan. Rumaystayaasha oo garta xaqiiqooyinka injiilku waxa ay u kordhinayaa garashada dunida, taasi oo noqonaysa aasaaska yaqiintooda waana marka ay la midowdo rumaysadka shakhsi ahaaneed ee Masiixa.

1. 1.Rumaystayaasha waxa u ahaatay nolol weligeed ah (aayadda 13, *oida*, fal ebyan oo ku dhisan wax la garanayo)
2. Ilaah waxa uu maqlayaa baryada rumaystayaasha (aayadda 15, *oida*, fal ebyan oo ku dhisan wax la garanayo tumsayna sida)
3. Ilaah waxa uu aqbalaa baryada rumaystayaasha (aayadda 15, *oida*, waa fal ebyan oo garasho ku dhisan waxna tumsaynaya).
4. Rumaystayaashu waxay ka dhashaan Ilaah (aayadda 18, *oida*, waa fal ebyan oo ku dhisan garasho tumsayna sida)
5. Rumaystayaashu waxay ka ahaadeen Ilaah (aayadda 19, *oida*, fal ebyan oo ku dhisan garasho tumsayna sida)
6. Rumaystayaashu waxay ogyihiin in Masiixu imanayo oo fahanna uu siiyay (aayadda 20, *oida*, fal ebyan oo ku dhisan garasho tumsayna sida)
7. Rumaystayaashu waxay garanayaan Ilaah runta ah – Aabbaha iyo Wiilka (aayadda 20, *ginōskō*, fal ebyan oo ku dhisan garasho tumsayna sida).

MAWDUUC GAAR AH: BALLAN QAAD

- A. Rumaystayaashu ma ogaan karaan inay badbaadeen (1 Yooxanaa 5:13)? 1 Yooxanaa waxa uu dhigayaa saddex imtixaan.
 1. Imtixaanka caqiido ahaaneed (aayadaha 1,5,10; 2:18-25; 4:1-6,14-16; 5:11-12)
 2. Imtixaanka qaab nolol ahaaneed (addeecitaanka) (aayadaha 2-3; 2:3-6; 3:1-10; 5:18)
 3. Imtixaanka bulshada (jacayl) (aayadaha 2-3; 2:7-11; 3:11-18; 4:7-12, 16-21).
- B. Ballan qaadku waxa uu noqday arrin mad-hab ahaaneed
 1. John Calvin waxa uu rumaysnaa in ballan qaadka ay asaas u tahay doorashada Ilaah. waxa uu sheegay intaynaan noloshan dhexdeeda ku ogaan karin.
 2. John Wesley isna wuxuu rumaysnaa in ballan qaadka uu asaas u yahay imtixaanka diin ahaaneed. Waxaanu rumaysnaa inaga oo awoodi karna inaan noolaan nolol aan lahayn inta denbiga laga yaqaano.
 3. Roman Catholigu waxa ay rumaysan yihiin in ballan qaadka asaaskiisu yahay talinta kaniisadda, sidaasi darteedna qofka oo ka mid noqda kaniisaddu waa ballan qaadka badbaadadiisa.
 4. Badanaa Evangeligu iyana waxay rumaysan yihiin in ballan qaadka asaaskiisu yahay, ballan qaadyada ku sugan kitaabka, taasi oo la xidhiidha midhaha Ruuxa Quduuska ah ee nolosha rumaystaha (Galatiya 5:22-23).
- C. Waxaan u malaynayaa ballan qaadka aadanuhu inuu la xidhiidho Ilaah isku muujiyay Saddexmidnimada.
 1. Jacaylka Ilaaha Aabbaha ah.
 - a. Yooxanaa 3:16; 10:28-29.
 - b. Rooma 8:31-39.
 - c. Efesos 2:5, 8-9.
 - d. Filiboy 1:6.

- e. 1 Butros 1:3-5.
- f. Yooxanaa 4:7-21.
- 2. Ilaah Wiilka ah shaqadiisa
 - a. U dhimashada inaga darteen
 - 1) Falimaha Rasuullada 2:23
 - 2) Rooma 5:6-11
 - 3) 2 Korintos 5:21
 - 4) 1 Yooxanaa 2:2; 4:9-10
 - b. Baryadiisa shafeecay qaadista ah (Yooxanaa 17:12)
 - c. Shafaacadiisa joogtada ah
 - 1) Rooma 8:34
 - 2) Cibraaniyada 7:25
 - 3) 1 Yooxanaa 2:1
- 3. Ilaah Ruuxa ah adeeggiisa
 - a. Yeedhitaanka (Yooxanaa 6:44,65)
 - b. Shaabbaddiisa
 - 1) 2 Korintos 1:22; 5:5
 - 2) Efesos 1:13-14; 4:3
 - c. Hubaashiisa
 - 1) Rooma 8:16-17
 - 2) 1 Yooxanaa 5:7-13
- D. Aadanuhu waa inay ka jawaab celiyaan axdiga Ilaah bixiyay (ugu horrayn iyo kusii socosho labadaba).
 - 1. Rumaystayaashu waa inay towabad keenaan oo rumaystaan Ciise.
 - a. Markos 1:15
 - b. Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21.
 - 2. Rumaystayaashu waa inay aqbalaan waxa Ilaah ku siiyay Masiixa.
 - a. Yooxanaa 1:12; 3:16
 - b. Rooma 5:1 (10:9-13)
 - c. Efesos 2:5,8-9
 - 3. Rumaystayaashu waa inay kusii socdaan rumaysad
 - a. Markos 13:13
 - b. 1 Korintos 15:2
 - c. Galatiya 6:9
 - d. Cibraaniyada 6:9
 - e. 2 Butros 1:10
 - f. Yuudas 20:21
 - g. Muujintii 2:2-3.7.10.17.19,25-26; 3:5,10,11,21
 - 4. Rumaystayaashu waxay waajahayaan saddex imtixaan
 - a. Caqiido ahaan (aayadaha 1,5,10; 2:18-25; 4:1-6, 14-16)
 - b. Qaab nololeed (aayadaha 2-3; 2:3-6; 3:1-10)
 - c. Bulsho ahaan (aayadaha 2-3; 2:7-11; 3:11-18; 4:7-12, 16-21)
- E. Ballan qaadku wuu adagayhay maxaa yeelay.
 - 1. Hadiyo goor rumaystayaasha waxay raadiyaan imtixaano tiro badan oon Kitaabka ku jirin.
 - 2. Hadiyo goor rumaystayaashu si buuxda uma fahmaan injiilka.
 - 3. Badanaa rumaystayaashu waxay kusii socdaan denbi galista (1 Korintos 3:10-15; 9:27; 1 Timoteyos 1:19-20; 2 Timoteyos 4:10; 2 Butros 1:8-11).
 - 4. Dadka qaarkood (kuwa isla saxsan) suurto gal uma aha inay aqbalaan jacaylka Ilaah ee bilaa shuruudda ah.
 - 5. Waxa jira tusaalayaal Kitaabka ku sugan oo ah qirashooyin been ah (Matayos 13:3-23; 7:21-23; Markos 4:14-20; 2 Butros 2:19-20; 1 Yooxanaa 2:18-19).

5:14 “kalsoonaanta aynu isaga u qabno” waa mawduuc soo noqnoqonaya (2:28; 3:21; 4:17) waxaanu cabirayaa ku dhiirashada iyo xorriyadda loo haysto in Ilaah loo dhowaado (Cibraaniyada 4:16). Eeg Mawduuca Gaarka ah 2:28.

▣ **“haddii”** waa weedh shuruudeed heerka saddexaad ah oo faa’idaynasa suurta galmimada.

▣ **“wax uun doonistiisa ku barinno”** waxay muuqataa in hadallada Yooxanaa ay tilmaamayaan xadays la’aanta rumaystuhu uu ugu soconaya xagga Ilaah. baryada iyo sida loo gudanayaa waxa ay caddayn u tahay rumaystaha runta ah. Waxa la inaga rabaa in salaaddeenu aanay ahaanin doonisteena balse ahaado doonista Ilaah ka leeyahay nolosheenna (3:22; Matayos 6:10; Markos 14:36). Eeg fiirada 3:22. Mawduuca Gaark ahna: Yooxanaa 4:34. Eeg Mawduuca Gaarka ah: 3:33.

MAWDUUC GAAR AH: SALAADDA DHEXDHEXAADINTA AH

I. Hordhac

- A. Tukashadu waxay ku eg tahay tusaalihii Ciise
 1. Salaad gaar ah, Markos 1:35; Luukos 3: 21; 6:12; 9:29; 22:29-46
 2. Nadiifinta macbudka, Matayos 21:13; Markos 11:17; Luukos 19:46
 3. Tukashada beenta ah Matayos 6:5-13; Luukos 11:2-4
- B. Tukashadu waa anngoo si ficil ahaan u muujinayna rumaysadkeenna shaqsi ahaaneed, annagoo daryeelaynna Ilaaha jooga doonistiisa, isagoo noo hadli kara una hadli kara kuwa kale tooda.
- C. Ilaa hwuxuu si shaqsi ahaaneed u xadeeyay in uu markiiba uga jawaabo baryooyinka carruurtiisa meelo badan (cf. Yacquub 4:2)
- D. Ujeedka ugu weyn ee salaaddu waxaa weeyaan in wehelnimo iyo waqti lala qaato Ilaah Qaadirka ah.
- E. Waxa tukashada diiradda lagu saarayo waa shay kasta ama mid kasta oo dan u haya rumaystayaasha. Waxaan ka tukan karnaa hal mar , innagoo rumaysan, ama marar badan haddii fakarka ama dantu soo noqnoqto.
- F. Salaadda waxaa ku jiri kara arrimo dhowr ah.
 1. In la ammaano oo la caabudo Ilaah Qaaddirka ah.
 2. In Ilaah looga mahad celiyo xaaridnimadiisa, wehlnimadiisa, iyo adeeggiidsa.
 3. Qirasho dembiyadeenna ah, kuwii tegay iyo kuwa jooga labadaba
 4. In aan ka soo laabanno damacyadeenna iyo rabitaannadeenna
 5. In aan qalbi ahaan uga marqaati kacno halka aannu ka qabanaynno baahiyada iyo kuwa kale Aabbaha hortiisa
- G. Sallaadda aad u tukato qofka aoo kaa maqan waa wax cajiib ah. Ilaah wuu jecel yahay marka aannu kuwa kale u ducaynno in ka badan inta aann shaqsi ahaanteenu u ducaysanaynno, iyadoo baahiyadu ay weli saamayn ku yeeshaa is beddelka, wax la doonayo in laga jawaabo ama baahi, nafteenno oo qura ma aha laakiin, iyaga.

II. Waxyaabaha Baybal ahaaneed

A. Axdigii Hore

1. Tusaalooyin dhowr ah oo ah u tukashada kuwa kale
 - a. Abraham oo u tukanaya Sodom, Bilowgii 18:22ff
 - b. Salaadihii Muuse ee reer Bani Israa’iil
 - (1) Baxniintii 5:22-23
 - (2) Baxniintii 32:31ff
 - (3) Sharciga ku noqoshadiisa 5:5
 - (4) Sharciga ku noqoshadiisa 9:18,25ff
 - c. Samuu’eel oo u ducaynaya Reer bani Israa’iil
 - (1) I Samuu’eel 7:5-6,8-9
 - (2) I samuu’eel 12:16-23
 - (3) I Samuu’eel 15:11
 - d. Daa’uud oo u duceeyay wiilkiisii, II Samuu’eel 12:16-18
 1. Ilaah wuxuu doondoonyaa kuwo kuwa kale u duceeya, Ishacyaah 59:16

2. Dembiga la og yahay, ee aan la qiran ama maanka tawbadkeen la'aanta aku wuxuu wax yeelleeyaa tukashooyinkeenna.
 - a. Sabuurrada 66:18
 - b. Maahmaahyadii 28:9
 - c. Ishacyaah 59:1-2; 64:7

A. Axdiga Cusub

1. Adeegga tukasho ee Wiilka iyo Ruuxa
 - a. Ciise
 - (1) Rooma 8:24
 - (2) Cibraaniyada 7:25
 - (3) I Yooxanaa 2:1
 - b. Ruuxa Qudduuska ah, Rooma 8:26-27
2. Adeegii tukashada ee Bawlos
 - a. U tukashadiisii Yuhuudda
 - (1) Rooma 9:1ff
 - (2) Rooma 10:1
 - b. Salaadihiisii Macbudyada
 - (1) Rooma 1:9
 - (2) Efesos 1:16
 - (3) Filiboy 1: 3-4,9
 - (4) Kolosay 1:3,9
 - (5) I Tesaloniika 1:2-3
 - (6) II Tesaloniika 1:11
 - (7) II Timoteyos 1:3
 - (8) Felemon aayadda 4
 - c. Bawlos oo kaniisadaha weyddiistay in ay u soo duceeyaan
 - (1) Rooma 15:30
 - (2) II Korintos 1:11
 - (3) Efesos 6:19
 - (4) Kolosay 4:3
 - (5) I Tesaloniika 5:25
 - (6) II Tesaloniika 3:1
3. Adeeggi Kaniisadda ee ducada
 - a. In la isku duceeyo
 - (1) Efesos 6:18
 - (2) I Timoteyos 2:1
 - (3) Yacquub 5:16
 - b. Salaado loo codsaday kooxo gaar ah
 - (1) Cadawyadeenna, Matayos 5:44
 - (2) Shaqaalaha Masixiyiinta, Cibraaniyada 13:18
 - (3) Hoggaamiyeyaasha, I Timoteyos 2:2
 - (4) Kuwa jirran, Yacquub 5:13-16
 - (5) Back sliders Dembiga xagga dhimashada I Yooxanaa 5:16
 - c. Salaad dadk a oo dhan ah, I Timoteyos 2:1

III. Shuruudaha salaadda laga jawaabo

- A. Xiriirkeenna aannu la leenahay Masiixa iyo Ruuxa
1. In isaga lagu jiro, Yooxanaa 15:7
 2. Magaciisa, Yooxanaa 14:13,14; 15:16; 16:23-24
 3. IN Ruuxa lagu jiro, Efesos6:18; Yuudas 20
 4. Doonista Ilaa hawgeed, Matayos 6:10; I Yooxanaa 3:22; 5:14-15
- B. Ujeeddooyinka
1. IN aadan ku celcelin, Matayos 21:22; Yacquub 1:6-7
 2. Is hoosaysiin iyo tawbadkeen, Luukos 18:9-14

3. Si xun u weyddiisasho, Yacquub 4:3
 4. Danaystenimo, Yacquub 4:2-3
- C. Arrimo kale
1. Dib u xallin
 - a. Luukos 18:1-8
 - b. Kolosay 4:2
 - c. Yacquub 5:16
 2. Wada weyddiisashada
 - a. Matayos7:7-8
 - b. Luukos 11:5-13
 - c. Yacquub 1:5
 3. Muranka Gurigaaga, I Butros 3:7
 4. Xor ka noqoshada dembiga la og yahay
 - a. Saburrada 66:18
 - b. Maahmaahyadii 28:9
 - c. Ishacyaah 59:1-2
 - d. Ishacyaah 64:7

IV. Gabaggabo Tiyooloji ahaaneed

- A. Maxaa muhiimad ah! Maxaa fursad ah! Maxaa waajib iyo masuuliyad ah!
- B. Ciise ayaa ah tusaalaheenna. Ruuxu waa hagaheenna. Aabbuhu si xamaasad leh ayuu inoo sugayaa.
- C. Way beddeli kartaa adiga, qoyskaaga, saaxiibbadaa, iyo adduunkaba.

5:15 “haddii” waa weedh shuruudeed heerka koobaad ah (laakiin waxa la socda *ean* iyo tasmayn, eeg A. T. Robertson, Word Pictures in the New Testament, p. 243), waxaanay u muuqataa mid sax ka ah xagga qoraaga amaba uu uga socdo ujeedo suugaan ahaaneed. Waa jumlad shuruudeed aan caadi ahayn:

1. Waxa la adeegsaday *ean* beddelka *ei* (Falimaha Rasuullada 8:31; 1 Tesaloniika 3:8).
2. Waxa la socota *ean* oo uu la socdo loo tiiriye, kaasi oo qaab ahaan caadi ku ah shuruudda heerka saddexaad.
3. Waxa jira jumlad shuruudeedyo heerka saddexaad ah oo ku sugan aayadaha 14 iyo 16.
4. Fiqiga baryada Masiixiyiinta oo la xidhiidha doonista Ilaah (aayadda 14) iyo magaca Ciise (aayadda 13).

☐ **“ognahay”** waa fal ebyan oo kale kuna dhisan wax la garanayo isagoo wax tasmaynaya. Wuxuu u muuqdaa sidii fal wakhti xaadirka jooga, waxaanu la mid yahay aayadda 14. Rumaystuhu wuxuu ogsoonyahay in Aabbuhu uu u jawaabo carruurtiisa.

NASB (UPDATED) TEXT: 5:16-17

¹⁶Haddii qof uun arko walaalkii oo samaynaya dembi aan xagga dhimashada ahayn, waa inuu Ilaah baryo; isaguna noloshuu siin doonaa kuwa samaynaya dembi aan xagga dhimashada ahayn. Waxaa jira dembi xagga dhimashada ah. Oo anigu odhan maayo, Kaas ha ka tukado. ¹⁷Xaqdarrada oo dhammu waa dembi; oo waxaa jira dembi aan xagga dhimashada ahayn .

5:16 “haddii” waa jumlad shuruudeed heerka saddexaad ah oo faa’idaynasa arrin dhicitaankeeda la filayo. Aayadda 16 waxay adkaynasa baahida aan u qabno inaan u tukano rumaystayaasha kale (Galatiya 6:1; Yacquub 5:13-18) iyadoo koobsanaysa xad la soo jeediyay (oon ahayn denbiga dhimashada), taasi oo u muqatay inay la xidhiidhay bidcoolayaasha (2 Butros 2).

☐ **“arko walaalkii oo samaynaya dembi aan xagga dhimashada ahayn”** Yooxanaa waxa uu sheegayaa dhowr qaybood oo denbiga ah: qaarkood waxa ay la xidhiidhaan qofku (1) weheshiga uu la leeyahay Ilaah; (2) weheshiga uu la leeyahay rumaystayaasha kale; iyo (3) weheshiga uu la leeyahay dunida. Denbiga ugu wayni waxa weeyi iyadoo la diido in la isku halleeyo Ciise oo la rumaysana waayo. Tanina waa denbiga u ahaaday dhimashada! W. T. Connors ayaa kitaabkiisa *Christian Doctrine* waxa uu ku leeyahay:

“Tan loogalama jeedo iyadoo la rumaysto caqiidooyin gaar ah, laakiinse waa rumaysad la’aan uu qofku ku diidayo nuurka akhlaaq ahaaneed iyo ka ruux ahaaneed, ee jidhka kusoo qaatay Ciise Masiix. Waa diiditaanka muujinta Ilaah ee kama dambaysta ah, kaasi oo uu isku dhex muujiyay Masiixa dhexdiisa. Marka diidmadani noqonayso kama dambays iyo kasitaan, waxa uu u ahaanayaa dhimashada (1 Yooxanaa 5:13-17). Waxa uu noqonayaa is miidaamin akhlaaq ahaaneed, iyadoo la moodo in qofku uu ka takhallusay indhihiisii ruuxiga ahaa. Ismiidaamintani ma dhacdo, ilaa ay ku timaaddo heer aad u sarreeyo oo iftiimin ah, waana diidmo kasitaan ah, oo lagu diidayo in Ciise uu yahay xaq, iyo inuu yahay muujinta Ilaah. Waxa lagu magacaabaa middan caddaanka madow” (pp. 135-136).

MAWDUUC GAAR AH: WAA MAXAY DENBIGA U AHAADAY DHIMASHADU?

A. Xisaabinta tafsiir ahaaneed.

1. Waxa laga maarmaan ah in macnuhu waafaqo dhacdooyinka taariikh ahaaneed ee 1 Yooxanaa.
 - a. Bidcoolayaasha macallimiintooda oo joogay kaniisadaha (2:19,26; 3:7; 2 Yooxanaa 7).
 - (1) “Cerinthian” Gonostigii raacsanaa ayaa rumaysnaa in Ciise uu ahaa dad ka hor ruuxa Masiixa baabtiiskiisii iyadoo sidoo kalena uu ka tegay intii aanu ku dul dhiman isku tallaabta (5:6-8).
 - (2) Gonostigii docetigu waxay diiddanaayeen aadananimada Ciise waayo maaddadu waa shar (1:1-3).
 - (3) Kuwo ka mid ahaa Gonostigga ayaa rumaysnaa nolol ka madhan sharciga iyagoo sheeganaya in jidhka la siiyo wax alla waxa uu rabo.
 - (a) Maaddaama oo badbaadu ahayd run lagu muujiyay maanka, jidhka aadanuhu lama xidhiidho xukunka ruuxiga ah, sidaasi darteedna wixii uu jidhku doono waa inuu helo. Waxa kuwan lagu tilmaamay Gonostigga xorta ah.
 - (b) Kooxda kalena waxa ay rumaysnaayeen maaddaama oo jidhku shar yahay (fikir Giriig ah), waa in la iska ilaaliyo waxa uu jidhku rabo. Waxa iyaga lagu magacaabi jiray Gonostiga sheeganaya inay qumman yihiin.
 - b. Macallimiintaas beenta ahi waxay ka tegeen kaniisadda (2:19), laakiinse saamayntoodu kamay tegin!
2. Waxa lagama maarmaan ah in la xaddido macnaha suugaan ahaaneed ee kitaabka oo dhan.
 - a. 1 Yooxanaa waxa loo qoray iyadoo laga hortegayo waxbarista beenta ah iyo dhiirri gelinta rumaystayaasha saxda ah.
 - b. Labadan ujeeddo waxa aan ka arki karnaa tijaabintu rumaystayaasha runta ah xagga:
 - (1) Caqiido ahaaneed
 - (a) Ciise wuxuu ahaa aadane dhammays tiran (1:1-3; 4:14)
 - (b) Ciise waxa uu ahaa Ilaah runa (1:2; 5:20).
 - (c) Aadanuhu waa denbi miidhan waxaanay masuul ku yihiin Ilaah hortiisa (1:6,10)
 - (d) Aadanaha sidoo kale waa la cafiyay waxaana Ilaah hortiisa lagaga dhigay xaq iyadoo taasina ku timid
 - i. Dhimashadii Ciise (1:7; 2:12; 3:16; 4:9-10,14; 5:6-8).
 - ii. Rumaysashada Ciise (cf. 1:9; 3:23; 4:15; 5:1,4-5,10-12,13).
 - (2) Dabiqitaan (dhinaca wanaagsan)
 - (a) Nolosha addeecitaanku ku jiro (cf. 2:3-5; 3:22,24; 5:2-3).
 - (b) Nolosha jacaylku ku dheehan yahay (2:10; 3:11,14,18,23; 4:7,11-12,16-18,21).
 - (c) Nolosha ay ka muuqato lamidnimada Masiixu (does not sin, cf. 1:7; 2:6,29; 3:6-9; 5:18)
 - (d) Nolosha ka guulaysanaysa sharka (cf. 2:13,14; 4:4; 5:4)
 - (e) Eraygiisu iyaguu ku dhex jiraa (cf. 1:10; 2:14)
 - (f) Waxay haystaan Ruuxa (cf. 3:24; 4:4-6,13)
 - (g) Baryada la aqbalayo (cf 5:14-15).
 - (3) Dabiqitaan (dhinaca xun)
 - (a) Nolosha denbigu ka muuqdo (cf. 3:8-10)
 - (b) nolosha nacaybku ka muuqdo (cf. 2:9,11; 3:15; 4:20)
 - (c) Nolosha bilaa addeecitaanka ah (cf. 2:4; 3:4)

- (d) Jeclaanshaha dunida (cf. 2:15-16)
- (e) Diidista Masiixa (wuxuu diidaa Aabbaha iyo Wiilka, cf. 2:22-23; 4:2-3; 5:10-12)
3. Waxa habboona in la xadeeyo macnaha iyadoo la isku xidhiyo ereyada isku sadarka ah (5:16-17).
- Erayga ah “walaalkii” ee aayadda 16 ma waxa uu tilmaamayaa kuwa galaya denbiga u ahaaday dhimashada iyo kuwo galaya denbiga aan u ahaanin dhimashada?
 - Ka denbiga gala ma jiray wakhti uu xubin ka ahaa kaniisadda (2:19)?
 - Waa maxay muhiimadda qoraalka ku jirta:
 - Iyadoon erayga “denbi” la raacinin shaqal?
 - Ficilka “arka” isagoo ah shuruud heerka saddexaad ah, isla markaana uu la socdo waxa loo tiirinayo?
 - Sidee baryada qof rumaysta ahi (Yacquub 5:15-16) usoo celin kartaa nolosha weligeeda ee qof kale iyadoo kan loo tukanayaa aanu towbad keenin?
 - Sidee aayadda 17 ula xidhiidhaa noocyada denbiga (u ahaaday dhimashada, ka aan u ahaanin dhimashada)?
- B. Dhibaatooyinka fiqi ahaaneed.
- Mufasirku middan miyuu la xidhiidhin karaa
 - “denbiga aan la dhaafin” ee ku sugan Injiillada.
 - Ka “kusoo arooray” Cibraaniyada 6 iyo 10.

Waxay u muuqataa in qoraalka 1 Yooxanaa uu la mid yahay “denbiga aan la dhaafin” ee Farrisiiinta ee wakhtigii Ciise cf. Matayos.12:22-37; Markos 3:2-29), iyo sidoo kale mawqifka Yuhuudda aan rumaysadka lahayn ee ku sugan Cibraaniyada 6 iyo 10. Saddexdan kooxoodba waxay maqleen (Farrisiiinta, Yuhuudda aan rumaysadka lahayn, macallimiinta Gnostiga) injiika iyagoo si cad u maqlay, balse waxay diideen inay rumaystaan Ciise inuu yahay Masiixa.
 - Ma suurto galbaa in qadiyaddan laga eego dhinaca mad-hab ahaaneed?

Evangeliyiintu waxay aad u xoojiyiin muhiimadda ku jirta bilowga imtixaanka Masiixiga waxaanay iska dhaafeen nolosha kusii soconaysa imtixaanka runta ah. shaki kuma jiro in qadiyadaha casirta ee fiqi ahaaneed, inay ka yaabinayo Masiixiyiintii qarnigii koobaad, maxaa yeelay waxaan rabnaa ballan qaad ku dhisan aayado kala gooni ah ama caqliga ama doonisteenna aan ku taageerayno mad-had gaar ah.

Erayadii Ciise ee ku sugan Matayos 7 iyo Markos 7 waxay ahaayeen kuwo ku habboona kaniisaddii hore! Ciise muu rabin go’aan balse waxa uu rabay xer, manuu dalbin rumaysad ku dhisan caadifad gaaban, laakiinse qaab nololeed soconaya (cf. Matayos. 13:10-23; Yooxanaa 8:31-59). Masiixiyaddu maaha ficil tegay, laakiinse waa nolol soconaysaa oo ku dhisan towbad keen iyo rumaysad iyo addeecitaan. Maaha kaadh lagu galo janada oo hore loo iibsaday, sidoo kalana maaha caymis qofka wax ka ilaalinay xaasidnimo ama nolol aan ku dhisanayn akhlaaq.
 - Denbiga u ahaaday dhimashadu ma waxa uu tilmaamayaa dhimashada jidh ahaaneed ama ta weligeed ah? Yooxanaa adeegsiyiisa erayga *zoe* ee macnahan ka muuqdaa u dhowaanshaha dhimashada weligeed ah. Suurto gal ma tahay in Ilaah uu u qaado deganaanshaha weligiis ah kuwa denbiga sameeya? Macnuhu wuxuu u muuqdaa inuu toosinayo (1) baryada rumaystayaasha iyo (2) tawbad keenka runta ah ee denbiilayaasha, laakiinse marka middan labaadi dhici waydo oo ay kusii socdaan denbiga, natiijadu waxa ay noqonaysaa dhimasho soo degdegtay, si aanay markaas camalladooda xumi ceeb ugu keenin rumaystayaasha (cf. *When Critics Ask* oo uu leeyahay Norman Geisler iyo Thomas Howe, p. 541).

▣ **“isaguna noloshuu siin doonaa”** mushkiladda luqo iyo fiqi ahaaneed waxa ay dhibaato ku keenaysaa erayga “nolol” (*zoe*). Hadiyo goor eraygani qoraallada Yooxanaa waxa uu ku tilmaamayaa nolosha weligeed ah, laakiinse halkan waxay u muuqataa inay ku sheegayso, soo ceshasada caafimaadka iyo denbi dhaafka (i.e., la midtahay, adeegsiga Yacquub ee “badbaado” sida ku sugan Yacquub 5:13-15). Qofka loo tukanayo waxa lagu magacaabaa inuu yahay “walaal” taasi oo loogala jeedo rumayste.

5: 17 dhammaanba denbiyada waa la diiddan yahay, laakiinse waxa lagu aqbali karaa tawbad keen (bilow, cf. Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 20:21; xidhiidhin, cf. I Yooxanaa 1:9) iyo rumaysashada Masiixa, marka laga reebo rumaysasho la'aanta.

NASB (UPDATED) TEXT: 5:18-20

¹⁸Waan og nahay in ku alla kii Ilaah ka dhashay aanu dembaabin. Maxaa yeelay, kii ka dhashay Ilaah naftiisuu ilaaliyaa, oo ka sharka lihina ma taabto. ¹⁹Waxaynu og nahay inaynu kuwa Ilaah nahay, oo ay dunida oo dhammuna ku jirto gacanta ka sharka leh. ²⁰Waxaynu og nahay in Wiilka Ilaah yimid,

5:18 “Waan og nahay” eeg fiirada sadarka labaad ee 5:13.

▣ “ku alla kii Ilaah ka dhashay aanu dembaabin” waa magaca fal sameeyaha buuxa een la garanayn. Tani waa madawga iyo caddaanka lagu sheegay 3:6 iyo 9. Nolosha weligeed ahi waxa ay leedahay dabeecado muuqan kara, iyadoo macallimiinta beenta ahna dabeecaddoodu muujinayo waxa ku jira qalbiyadooda (Matayos 7). Yooxanaa waxa uu la hadlayaa labo kooxood oo ah macallimiinta beenta ah, waxayna kala yihiin kuwo diiday in denbi la geli karo (1:8-2:1) iyo kuwo kale oon dan ka gelin denbiga (3:4-10 iyo halkan). Denbiga ugu horrayn waa in la qiro kaddibna laga towbad keeno oo laga dheeraado. Denbigu waa dhibaataada marwalba soconaysaa (5:21).

Bruce Metzger, ayaa kitaabkiisa *A Textual Commentary of the Greek New Testament* (p. 718), waxa uu ku sheegayaa, in kala duwanaanshaha qoraal gacmeeyada lagu saleeyay, waxa uu u maleeyay kan qoraalka rarayaa erayada “ka dhashay Ilaah” iyadoo lagu sheegay:

1. Ciise – markaana *auton* ayaa ku habboona (A*, B*)
2. Rumaystayaasha – markaana *eauton* fits ayaa ku habboon (⌘, Ac)
UBS4 ku wuxuu ku dhigayaa #1 “B” da isagoo ku tirinaya (hubaal).

▣ “kii ka dhashay Ilaah naftiisuu ilaaliyaa” waa magaca fal sameeyaha wakhtiga tegay ee tilmaamaya shaqo lagu qabtay adeeg ka yimid dibadda (Ruuxa, Rooma 8:11). Middani waxa ay tilmaamaysaa jidh soo qaadashada. Falka labaad waa ficil ah wakhti xaadirka jooga oo ku dhisan wax la garanayo waxna tusmaynaya, waxaana la socda “isaga” (*auton*). Macno ahaan waxa weeyi “kan ka dhashay Ilaah ayaa marwalba ilaaninaya.” Waxa weeyi Masiixa oo si joogta ah u ilaalinaya rumaystaha. Fasiraaddani waxa ay kusoo arooraysaa qoraal gacmeedyada Giriigga A* iyo B*. Waxaana fasiraaddan laga helayaa tarjumaadaha Ingiriisida ee NASB, RSV, iyo NIV.

Qoraal gacmeedyada ⌘ iyo A^c waxa ay dhigayaan magac u yaal kale, “naftiisuu ilaaliyaa” (*eauton*), waxaanay tilmaamaysaa in ka kashay Ilaah ay ku waajibayso masuuliyadda ilaalinta naftiisu. Falka halkan lagu adeegsaday ee “ka dhashay” meel kale looguma adeegsan Ciise. Fikirka ka muuqanaya waxa loo adeegsaday rumaystayaasha sida ku sugan 3:3 iyo 5:21. Waxa middana raacaya tarjumaadaha Ingiriisida ee KJV iyo ASV.

▣

NASB	“ka sharka lihina ma taabto”
NKJV	“kuwa xumi ma taabtaan”
NRSV	“ka sharka lihi ma taabto iyaga”
TEV	“ka sharka lihi waxba ma yeeli karo”
NJB	“ka sharka lihi isaga ma maamuli karo”

Waa ficil wakhti xaadirka jooga oo wax tusmaynaya, iyadoo ka sharka leh aanay u suurto galaynin, inay ku socdaan “wax yeelista.” Qoraallada Yooxanaa hadalka sidana markale oo qudha ayaa lagu adeegsanayaa, waana Injiilka Yooxanaa 20:17. Kitaabku waxa uu inoo sheegayaa in rumaystayaashu jarribaadda marayaan.

Waxa jira saddex aragtiyood oo muhiim ah kuna saabsan macnaha eraydan:

1. Rumaystayaashu waxay xor ka yihiin xukumista sharlowga ku salaysan ku xadgudubka shariga.
2. Ciise inagu inoo ducaynayaa (cf. I Yooxanaa 2:1; Luukos 22:32-33).
3. Shaydaanku inaga qaadan karo badbaadadeenna (Rooma 8:31-39), inkastoo uu xumaynayo sumcadda markhaatifurka Ilaah ee ku sugan nolosheenna, waxaana u suurto geli karta inuu nolosha hore uga qaato rumaystaha marka loo eego aayadaha 16-17.

5:19 “Waxaynu og nahay inaynu kuwa Ilaah nahay” tani waa kalsoonida iyo yaqiinta rumaystaha ku dhex jira Ciise Masiix (4:6). Dhammaan kuwanina waxa ay ku salaysan yihiin run cajiib leh (aayadda 13). Eeg fiirada 5:13.

▣ **“dunida oo dhammuna ku jirto gacanta ka sharka leh”** waa fal wakhti xaadirka jooga oo tusmayn xambaarsan (cf. Yooxanaa 12:31; 14:30; 16:11; II Korintos. 4:4; Efesos. 2:2; 6:12). Middani waxa suurto gala inay ku xaqiiqowday (1) denbigii Aadan; (2) Shaydaanka caasinimadiisii; iyo (3) qofkasta siduu u dooran karo inuu dembaabo.

5:20 “waxaynu og nahay” eeg fiirada sadarka labaad ee 5:13.

▣ **“in Wiilka Ilaah yimid”** waa falka wakhti xaadirka jooga ee la garanayo waxna tusmaynaya, waxaanu adkaynayaa jidh soo qaadashada Wiilka Ilaah. Jidh soo qaadashada Ilaah waxa ay mushkilad ku ahayd Gonistigga.

▣ **“oo wuxuu ina siiyey garasho”** waa fal buuxa oo ku dhisan garasho waxna tusinaya. Ciise, oon ahayn macallimiinta beenta ahi, waxa weeyi kan Ilaaha Aabbaha ah inoogu muujiyay noloshiisa, waxbaristiisa, camalladiisa, dhimashadiisa, iyo sarakicistiisa! Isagu waa erayga Ilaah ee nool; mana jirto cid isaga ka geesa oo u iman karta Aabbaha (cf. Yooxanaa 14:6; I Yooxanaa 5:10-12).

▣ **“innaguna waa ku jirnaa kan runta ah, oo ah Wiilkiisa ee Ciise Masiix ah. Kanu waa Ilaaha runta ah iyo nolosha weligeed ah.”** ereyga ah “kan runta ah” waxa uu tilmaamayaa Ilaah Aabbaha ah (eeg Mawduuca Gaarka ah 6:55 iyo Yooxanaa 17:3), laakiin shakhsiga lagu tilmaamay erayada “Ilaaha runta ah,” waxa adag in la garto. Macnaha marka la eego waxa laga yaabaa inay tilmaamayso Aabbaha, laakiinse fiqi ahaan waxa suurto gala inay tilmaamayso Wiilka. Waxa laga yaabaa dahsoonaanta naxwe ahaaneed inuu Yooxanaa u kasayay, sida ka muuqata qoraalladiisa, taasi oo ah inay lagama maarmaan tahay Aabbaha iyo Wiilka oo isku mida (aayadda 12). Runtu waxa ay ku jirtaa Aabbaha iyo wiilka labadaba (cf. Yooxanaa 3:33; 7:28; 8:26). Axdiga Cusubi waxa uu sheegayaa Ilaahnimada buuxda ee Ciisihii reer Naasereet (cf. Yooxanaa 1:1, 18; 20:28; Filiboy. 2:6; Tiitos 2:13; iyo Cibraaniyada. 1:8). Si kastabana ha ahaateen macallimiintii beenta ahaa ee Gonostigu waxay qirsanayaan Ilaahnimada Ciise (ugu yaraan marka laga eego joogitaanka ruuxda Ilaahiga ah).

5:21

Carruurtiyey, sanamyada iska ilaaliya.

5:21

NASB “nafihinna sanamyada ka ilaaliya”

NKJV, NRSV “sanamyada iska ilaaliya.”

TEV “nafihina ka ilaaliya ilaahyada beenta ah!”

NJB “iska ilaaliya ilaahyada beenta ah”

Waa ficil amar ah oo adkaynaya xaqiiqo guud ahaaneed. Aayaddani waxa ay tilmaamaysaa doorka wax ku oolka ah ee quduusnaanta Masiixiyiinta (3:3), taasi oo ay ku haystaan Ciise Masiix dhexdiisa (Efesos 1:4; I Butros 1:5).

Erayga ah sanamayo (kaasi oo labo jeer oo keliya lagu dhex adeegsaday qoraallada Yooxanaa, halkan iyo xigasho Axdiga Hore ah oo ku sugan Muujintii 9:20), waxa ay noqon kartaa mid la xidhiidha waxbarista iyo qaab nololeedka macallimiinta beenta ah, ama waa sababta Qoraallada Badda Dhimatay laga helay ay eraygan ugu adeegsanayaan macnaha “denbi.” Ereyada “sanam” iyo “denbi” waxa laga yaabaa inay siman yihiin.

SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Tiri imitixaanka saddexda ah ee tusin karta in rumaystayaashu ay ku jiraan Masiixa.
2. Ereyada “biyo” iyo “dhiig” ee ku sugan aayadaha 6 iyo 8 maxay tusinayaan?
3. Ma awoodi karnaa inaan hubino badbaadadeenna? Ma waxa jira Masiixiyiin aan ogayn?
4. Waa maxay denbiga u ahaaday dhimashadu? Suurto gal matahay rumaystuhu inuu denbiga galo?
5. Maxaa inaga badbaadin kara jarribaadda? Ma awoodda Ilaah inagu ilaalinayaa mise waa dadaalkeenna shakhsi ahaaneed?

II YOOXANAA

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Salaan vv. 1-3	Salaanta marwada la doortay vv. 1-3	vv. 1-2 v.3	Hordhac vv. 1-3	Salaan vv.1-3
Run iyo jacayl vv. 4-11	ku socoshada amarada Ciise vv. 4-6 ka taxadira khaa'imiinta ka geesta ah Masiixa vv. 7-11	vv. 4-6 vv. 7-11	Run iyo jacayl vv. 4-6 vv. 7-8 vv.9-11	Sharciga jacaylka vv. 4-5 cadaawayaasha Masiixa vv. 7-11
Macasalaamayn v.12-13	Sagootiga Yooxanaa v.12-13	v.12 v.13	Erayada ugu danbeeya v.12 v.13	v.12 v.13

HORDHAC KOOBAN

2 Yooxanaa waxa uu si cad ula xidhiidhaa fariinta iyo qaabka hab suugaaneedka 1 Yooxanaa . waxa ay ka wada yimaaddeed isku hal qoraa, waxaana la qoray ugu dhawaan isku hal waqti. Nooceedu waa waraaqihii gaarka ahaa ee qarnigii koowaad kuwaasoo loo qoray hab is le'eg loo qoray oo le'eg waraaqda papyrus.

Sida 1 Yooxanaa loogu qoray dhowr kaniisadood (iyo qaab ahaan kaniisadaha oo dhan), 2 Yooxanaa waxaa lagu hagaajiyey hal kaniisad degaaneed iyo hoggaamiyeheeda (in kastoo, Axdiga Cusub dhexdiisa waraaqaha gaarka ah loo aqriyi jiray kaniisadda oo dhan). Waa daaqad yar oo la yaab leh oo ay ku jirto kaniisaddii qarnigii koowaad eek u tiil Aasiyada yar (Turki).

AKHRINTA TAXANAHA KOOBAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Kitaabka oo dhan waxa aad ku akhridaa hal kal fadhi, waxaanad lasoo baxdaa oo ereyadaada ku cabirtaa ujeedada gebi ahaanba kitaabku ka hadlyo

1. Ujeedada gebi ahaanba kitaabka
2. Qaabka qoraalkiisa (nooca)

AKHRINTA TAXANAHA LABAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Marlabaad kitaabka akhri waxaanad soo saartaa ujeedada muhiimka ah adigoo ku cabiraya hal jumalada.

1. Cinwaanka cutubka kowaad

2. Cinwaanka cutubka labaad
3. Cinwaanka cutubka saddexaad
4. Cinwaanka cutubka afraad
5. Iwm.

AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

BARASHADA EREYADA AAYADDAHA IYO WEEDHAHA

NASB (UPDATED) TEXT: 1-3

¹Anigoo odayga ah waxaan salaamayaa murwada la doortay iyo carruurteeda aan runta ku jeclahay, keligayna ma aha e, laakiin xataa waxaa jecel kuwa runta yaqaan oo dhan, ²runta inagu dhex jirta, weligeedna inagu dhex jiri doonta aawadeed. ³Nimco iyo naxariis iyo nabad ka yimaada Ilaaha Aabbaha ah iyo Ciise Masiix oo ah Wiilka Aabbaha ayaa inala jiri doona xagga runta iyo jacaylka.

Aayadda. 1 “ Odayga” magacaan (*presbuteros*) waxaa loo isticmaalay in lagu cadeeyo kan qoray 2 Yooxanaa iyo 3 Yooxanaa. Waana macno si wayn macruuf ugu ah Kitaabka Qudduuska ah.

Qoraallada Yooxanaa oo dhan wuxuu leeyahay magacyo oo siyaabo kala duwan ah.

1. Injiilku wuxuu isticmaalay erayo qarsoon sida “xerowgii la jeclaa”
2. Warqadii ugu horeysay magac muu lahayn
3. Warqada Labaad iyo tii Sedexaadba wuxuu ku magacownaa “Odayga”
4. Kitaabka Muujintii, waa shaqsiyad an la muujin ee ah qoraal digniin ah, qoraagune wuxuu ku liis gareysan yahay sida “Addeegihiisa Yooxanaa”

Doodo badan ayaa ka dhex jiray Sharaxayaal iyo Mutacalimiin badan oo ay ka doodaayeen kan uu yahay qoraaga qoraalladaan oo dhan. Kuligoodne waxay haystaan durkuno iyo qaabab si ahaan u kala duwan. Hadaba arintu marka halkaan marayso majiro sharaxaad laga aqbali karo macalimiinta Kitaabka Qudduuska ah. Anigu waxaan raac sanahay in Yooxanaa yahay Xerowga kuligoodba qoray, laakiin Tani waa mid saldhigeedu yahay sharaxaada qoraallada ee maahan mid saldhigeedu yahay waxyi. Run ahaantii Qoraaga dhabtaa ee Baybalka waa Ruuxa Qudduuska ah ee Rabbi. Waa waxyi run ah oo wax tar leh, laakiin casrigaan aan joogno ma oga ama ma fahamsana heerarkii uu soo maray qoraalladaan ama sidii ay ku dhamaystirmeen.

MAWDUUC GAAR AH: ODAY

1. Waxaa loo isticmaalay Malaa'igaha ILLAAH ee qabtay Kulan Malaa'igeed (Fiiri, Ishacyaah. 24:23). Howshaan lafteeda waxaa isticmaalay uunka malaa'igaha la yiraahdo ee waxyiga keena (Fiiri. 4:4,10; 5:5,6,8,11,14; 7:11,13; 11:16; 14:3; 19:4).
2. Waxaa isticmaalay hoggaamiyeyaashii qabiilada (*Zaqen*) ee Axdigii Hore (Fiiri. Baxniintii. 3:16; Tirintii. 11:16). Markii danbe ee injiilku yimid magacaan waxaa loo isticmaalay koox hoggaamiyeyaal ahaa ee ka socday Yerusalem sameeyayne maxkamada sarre ee yahuuda, the Sanhedrin (wadaaddadii sarre) (Fiiri. Matayos. 21:23; 26:57). Xiligii Masiixa kooxdan ka koobnayd todobada xumnood waxaa maamuli jiray wadaado musuqmaasuq miirana.
3. Xiliga injiilka waxaa loo isticmaalay hoggaamiyeyaasha Qaaska ah ee kaniisada, waxay ahayd mid sedex macno leh (Macalin, Kormeere, iyo Oday Fiiri Tiitos. 1:5,7; Falimaha Rasuullada 20:17,28). Bawlos iyo Yooxanaa ba way isticmaaleen iyagoo iyaga laftoodaba isku daraayo kooxda hogaamiyayaashaa (Fiiri 1 Butros 5:1; 2 Yooxanaa 1; 3 Yooxanaa).
4. Waxaa loo isticmaalay oo kale waayeelada kaniisada, muhiim maahan hoggaamiyenimo (Fiiri Timoteyos. 5:1; Tiitos 2:2).

▣ **“murwada la doortay iyo carruurteeda”** dood badan ayaa laga dooday magacaan. In badan ayaa isku dayday in ay ku saleeyaan magacaan in uu u qoran yahay Marwo una qoran yahay *Electa* oo ah luqada Giriiga macnaheeduna uu noqonaayo (la doortay) (ee qarnigii alagsandaria) ama KYRIA, oo ku noqonayso luqada Giriiga Marwo (Athanasius). Si kastaba ka ahaatee, aniga waxaan ku raacsanahay Jerome, in ay Tani la xariirto kaniisada sababahaan soo socdo aawadood.

1. Luqada Giriiga macnaha kaniisad waxay ku noqonee FEMININE (V. 1)
2. Gudaha LXX “elect” waxay tilmaamaysaa jirka dadka (Fiiri 1 Butros. 2:9)
3. Tani waxay macnaheedu noqon karaa kaniisada sida Arooska Masiixa (Fiiri Efesos. 5:25-32; Muujintii. 19:7-8; 21:2)
4. Kaniisadaan waxay lahayd xubinooyin oo lagu timaamay sida Ilmo (Fiiri. Aayadda. 13)
5. Kaniisadaan waxay leedahay walaasha oo u muuqato in la tilmaamooyi kaniisad kaloo ay isku meel ku yaaliin (Fiiri Aayadda 13)
6. Waxaa jiro dhaqdhaqaaq ka dhaxeeyo KELI iyo JAMAC cutubkaas oo dhan (KELI waxay ku jirtaa Aayadda 4, 5, 13; JAMACUNA waxay ku jirtaa Aayadda 6, 8, 10, 12)
7. Noocaane waxaa si isku mid ah loogu isticmaalay kaniisada 1 Butros. 5:13

▣ **“Kuwa”** waa la yaab in Tani u muuqato magac rageed oo jamac ah, sababtoo ah waxay macno ahaan la xariirtaa “Marwo,” taas oo ah DHEDIG ama “ilmo” kaasoo noqonaayo “Dib u habeen” . waxay ila tahay in ay ahayd qaabkii uu Yooxanaa weerta ugu calaameenaayay qaab Magac u yaal ah.

▣ **“jeclahay”** Yooxanaa wuxuu isticmaalay *phileō* si uu ugu si ugu bedelo eray ah *agapō* waxayna ku jiraan injiilka iyo weliba Muujintii, laakiin 1 Yooxanaa, 2 Yooxanaa iyo 3 Yooxanaa wuxuu isticmaalay Erayga ah AGAPAO (Fiiri, VV. 3, 5, 6; 1 Yooxanaa 3:18).

▣ **“runta”** runtu waa muuqaal marar badan soo laalaabto, (Fiiri. VV. 1 (labo mar), 2, 3, 4). Jumlada ah “Wax baristaan” ee ku jirta Aayadda 9 [labo mar] iyo Aayadda 10 aad waxay la mid tahay “run”, xaaladaane runtii waa mid calaamaysan sababtoo ah waa mid la isku diiday oo si cad ugu jirto warqadaan yar (Fiiri. VV. 4, 7-10) sida ay ugu jirtaba 1 Yooxanaa.

“Runta” waxaa lagu macnayn karaa mid ka mid ah sedex shay: (1) Ruuxa Qudduuska ah ee ku jira Yooxanaa (Fiiri. 14:17); (2) Masiixa laftiisa (Fiiri. Yooxanaa. 8:32; 14:6); iyo weliba (3) waxa ku jira injiilka (Fiiri. 1 Yooxanaa. 3:23). Fiiri mowduucyada Qaaska ah ee 6:55 iyo 17:3.

Aayadda 2 “inagu dhax jirta” tani waa ficil xaadir ah oo ka mid ah aramuhuu Yooxanaa ugu jeclaa si uu u Qeexo mumiinta “nala jira” Fiiri mowduuca Qaaska ah 2:10. Tani waxay u muuqataa in ay qeexayso Ruuxa Qudduuska ah ee inala jira (Fiiri. Rooma.8:9; ama Wiilka oo ah Masiixa, Rooma. 8:9-10). Mid walboo sedexnimada ka mid ah wuxuu ku jiraa/ lana jiraa Mumiinta oo dhan (Fiiri Yooxanaa 14:23).

▣ **“weligeedna inagu dhex jiri doonta”** Runtu waxay ku jiri doontaa lana jiri doontaa Muminiinta oo dhan ilaa iyo abad. Alla muxuu eray damaanad ah oo awood badan! Fiiri mowduuca Qaaska ah ee 1 Yooxanaa. 5:13. Runtu waa Ruuxa injiilka iyo Fariinta Injiilka labadaba. “Runtaan” waxay soo saartaa ama keentaa Jacayl, jacaylka Ilaah, axdiga aad ku jeceshahay walaasha iyo walaalka xertaa, iyo jacaylka aad u qabto aduunka kaloo lunsan ee aan Ilaah weliba aqoonsan (Fiiri. 1 Yooxanaa. 4:7-21).

“Weligeed” asal ahaan macnaheedu wuxuu yahay “inta Quruuntu jirto oo dhan” (Fiiri. Yooxanaa 4:14; 6:51, 58; 8:35, 51; 10:28; 11:26; 12:34; 13:8; 14:16: 1 Yooxanaa. 2:17). Fiiri mowduuca Qaaska ah ee “weligeed” ee kujira Yooxahana. 6:58.

Aayadda. 3 “Nimco iyo naxariis iyo nabad” Tanine waxay la mid tahay hordhac warqadii Giriiga ee Qarnigii koowaad oo laga reebay labo. Tan koowaad si tartiib ah ayay u bedelantay si ay u noqoto mid qaas u ah Masiixiyiinta. Qaabka Giiriigta ee “Salaanta” waxay ahayd *chairein* waxay u bedelantay *charis*, oo macnaheedu yahay “nimco.” hordhacanina wuxuu la mid yahay tii wax baristii Rasuullada, 1 Timoteyos. 1:2; 2 Timoteyos. 1:2; labo ka mid ah sedex weerood ayaa kusoo noqnoqday Hordhacii Bowlos ee uu u diray Kolosay iyo Tesaloniika.

Tan labaad dhismaha naxwaha caadigaa waa Duco ama Caafimaad oo loo rajoodo. Si kastaba ha ahaatee Yooxanaa Labaad waa qoraal ka hadlaayo Runta waa balan Ilaah la jiro oo ay la jirto nariijo rabaani ah oo aad loo rabo.

Cilmi diimeedka mid ayuu yaab ku noqonaa hadii uu jiri lahaa amar ula kac ah ama uu xiriir ka dhaxeen lahaa labaan qaabood. NIMCO iyo NAXARIIS waxay muujinaayaan shaqsiyada Ilaah oo aan bini aadamkaan danbiilayaasha ay ku helaayaan badbaadada xortaa ee Masiixa. Nabadu waxay muujinaysaa cadaaynta hadiyada Ilaah. Muminiinta waxay qibrad ahaan u arkaan is bedel dhamaystiran. Sida xumaantu u wada saamaynsay nolosha bini aadamka sidaas oo kale ayay badbaadaduna u wada saamaynsaa, ugu horayntii meel walbaba (sheegida sababta Rumaysadka), kaddibne la jiridda Ruuxa ayaa ayaa asalka iska bedesha marka loo fiirsho aragtida dunidaan, taas oo sababta horumar sida masiix u ekaansho (horumarka Karaamaynta). Muuqaalka Ilaah ee ku jirta bini aadanka (Fiiri. Bilowgii. 1:26-27) way soo noqotay!

Suuro galka kale ayaa wuxuu la xariiraa baahida sedexdaan mowduuc ee kujira iftiinka macalimiinta beentaa .waxay su’allo ka keenaan “Nimco” iyo “Raxmad” wax walboo kalene way keenaan laakiin “Nabad”. Weliba waa noqdo xiiso leh in la calaameeyo oo tan isticmaalkeedu yahay “Raxmad” (*eleeoi*) oo ku wada jira qoraalladii Yooxanaa oo dhan. “Nimco” (*charis*) meeshaan oo keliyah ayaa lagu isticmaalay ee ah Injiilka Aayadda 1:14, 16, 17, iyo Muujintii (Fiiri. 1:4; 22:21).

Jerome Biblical Commentary waxay tilmaameen xaqiiqada in sedexdaan mowduuc ay la xariiraan axdigii hore (P. 412). Qoraayaasha Injiilka (oo Luukos aanu ku jirin) waxay ahaayeen Allifayaal Yahuud ah, kuna qora xarfaha Giriigta. Erayo badan oo ku jira Injiilka ayaa waxay asalkoodu yihiin Xarfo Giriig ah.

▣ **“ka yimaada Ilaaha Aabbaha ah iyo Ciise Masiix”** Labada magacba waxa ay leeyihiin meeleyaha (*para*) oo naxwe ahaan isku meel dhigaya. Waa hab naxwe ahaaneed oo tilmaamaya Ilaahnimada buuxda ee Ciise Masiix.

▣ **“Wiilka Aabbaha”** caddaynta socota eek u jirta 1 Yooxanaa ayaa waxa ay tahay in midla uusan lahaan karin Aabbaha inuu wiilka helo mooyaane (cf. 1 Yooxanaa 2:23; 4:15; 5:10). Macallimiintii beenta ahaa waxa ay ku doodeen in xidhiidh aan lala wadaagin oo gaar ah ay la leeyihiin Ilaah, laakiin waxa ay fiqi ahaan qiimo jebiyeen qof ahaantii iyo shaqadii Wiilka. Yooxanaa waxa uu marar badan oo badan ku soo celceliyaa in Ciise uu yahay (1) muujinta Ilaah ee kaamilka ah iyo (2) jidka keliya (cf. Yooxanaa 14:6) ee loogu tago Aabbaha.

NASB (UPDATED) TEXT: 4-6

⁴Aad baan ugu farxay markaan arkay carruurtaadii qaarkood oo runta ku socda, waana sidaynu Aabbaha amar uga helnay. ⁵Oo haatan waxaan kaa baryayaa, Murwoy, sidii anigoo aan kuu soo qorayn amar cusub laakiinse kii aynu tan iyo bilowgii haysannay, kaasoo ah inaynu isjeclaanno. ⁶Tani waa jacayl inaynu amarradiisa ku soconno. Amarkiina waa kan, waana sidaad tan iyo bilowgii u maqli jirteen inaad ku socotaan.

Aayadda 4 “Aad baan ugu farxay” waa jumlad lagu qeexaayo ficil hore u dhacay oo lasoo hor marshay ficilkii la sameeyay (oo macno ku jiro) oo muujinu ku jiro ama tilmaamid. Waxaa suuro gal ah in odaygaanu uu maqlay wax ku saabsan kaniisadaan kana maqlay qaar ka mid ah dadka kaniisadaan oo safraayay.

▣ **“markaan arkay carruurtaadii qaarkood oo runta ku socda”** Tani waxay tilmaamaysaa labo arimood midood oo kala ah.

1. Illaah Rumaysad, qaar ka mid ah kaniisada oo qaab nololeedkoodu fiican yahay (Fiiri. 2 Yooxanaa 3-4)
2. Qaab lagu sheegaayo bidcinimo ka dhex jirto dadka oo qaarkood dulinimo u horseeday

▣ **“waana sidaynu Aabbaha amar uga helnay”** waa jumlad lagu qeexaayo ficil hore u dhacay oo lasoo hor marshay ficilkii la sameeyay oo muujinu ku jiro ama tilmaamid. Oo ticraaceedu yahay sharciyadii la isisiiyay oo ahaa in mid walbaa uu kan kale jeclaado, xataa siduu Masiixu u jeclaaday iyaga (Fiiri. Yooxanaa. 13:34-35; 15:12; 1 Yooxanaa. 3:11; 4:7, 11-12, 21).

Aayadda. 5 “kii aynu tan iyo bilowgii haysannay” Waa ficil muujin ah oo aan dhamaystirnayn kaasoo ticraacaayo bilowgii waxbaristii Masiixa (Fiiri. 1 Yooxanaa. 2:7, 24; 3:11). Ujeeddada sharciyadii ayaa waxaa lagu adkeeyay sida “isjeclaada” (Fiiri. Aayadda 5) iyo “in la Qirto in Masiixu Jidh ku yimid” (Fiiri Aayadda 7). Ujeeddada fiiro u yeelo, shaqsiyan iyo qaab nololeedba.

▣ **“kaasoo ah inaynu isjeclaanno”** waa ficil xaadir ah naxwo ahaan (waxay la mid tahay ficilka ugu danbeeya Aayaddaan oo ah, *soco*) waxay ahayd shaqsiyada bidcinimada in ay noqoto wax aan macruuf ahayn oo aan la jeclayn. Qaababkaan sedexdii rijaabood ee Yooxanaa ugu horeeyay ee ahaa siduu qof ku ogaan lahaa in uu yahay Masiixi. Sedexdaan tijaabood ee ku jira kitaabka 1 Yooxanaa waxay kala yihiin: Jacayl, qaab nololeed, iyo Caqiidada. Sedexdaan tijaabood waxay kusoo noqnoqonaayaan in badan 2 Yooxanaa.

1. Jacayl (Fiiri. Aayadda. 5; 1 Yooxanaa. 2:7-11; 3:11-18; 4:7-12, 16-21; 5:1-2)
2. Adeecid (Fiiri. Aayadda 6; 1 Yooxanaa. 2:3-6; 3:1-10; 5:2-3)
3. Ujeeddada Caqiidada (Fiiri. Aayadda 7; 1 Yooxanaa. 1:1ff; 2:18-25; 4:1-6, 14-16; 5:1, 5, 10)

Aayadda.6 “Tani waa jacayl” Jacayl (*agapē*) waa wax socdo (waa ficil xaadir ah) ficil, maahan wax ladareemaayo oo keliyah. Jacaylku waa “calaamadda” muminiita dhabtaa ay leeyihiin (Fiiri. 1 Korintos. 13; Kolosay.5:22; 1 Yooxanaa. 4:7-21).

▣ **“tan iyo bilowgii”** Fiiri Faahfaahinta 1 Yooxanaa. 1:1. Waxaan u maleenaa in kalmadaan lagu isticmaalay 1 Yooxanaa iyo 2 Yooxanaa sii raad raac ah bilowgii howshii Masiixa.

▣ **“ku socotaan”** Masiixinimadu waa balan qaad bilaabid iyo qaab nololeedka oo la bedelo (Fiiri. 1 Yooxanaa. 2:6). Qaab nololeedkeena inaba badbaadin karaan, laakiin wuxuu xaqiijiyaa in aan badbaadnay (Fiiri Efesos. 2:8-9 iyo 2:10).

NASB (UPDATED) TEXT: 7-11

⁷Waayo, khaa'inno badan baa dunida u soo baxay, waana kuwa aan qiran in Ciise Masiix jidh ku yimid. Kaasu waa khaa'inka iyo ku Masiixa ka gees ah. ⁸Iska jira si aydnaan u khasaarayn wixii aynu falnay, laakiinse si aad abaalgud dhan u heshaan. ⁹Mid kasta oo dhaafa oo aan cilmiga Masiixa ku sii socon, kaasu Ilaah ma leh; laakiin kii cilmiga ku sii socdaa, Aabbaha iyo Wiilka labadaba wuu leeyahay. ¹⁰Haddii nin idiin yimaado oo uusan cilmigan idiin keenin, gurigiinna ha soo gelinina, hana salaamina, ¹¹waayo, kii salaamaa, wuxuu ka qayb galaa shuqulladiisa sharka ah.

Aayadda. 7. “khaa'inno badan” Ereyga “khaainno” waxa uu ka yimid erey Giriig ah oo *plane*, oo afka Soomaaligana ku noqonaya “Meere.” Dunidii hore dhexdeedii jirarka samaawiga ah ayaa la bartay oo maab loo samaystay (*zodiac*). Xiddiguhu meel le’eg ayey ku fadhayaan, laakiin xiddigaha qaar (waa meerayaashee) waxa ay u dhaqaaqaan si aan caadi ahayn. Dadkii hore waxa ay ugu yeedheen “wareegayaasha.” Tani waxa ay masaal ahaan u tahay kuwaa ka warwareegaya runta.

Macallimiintan beenta ahu ma aha kuwa khaldan oo marin habaabiyeey dadka jaahilka ka ah Injiilka. Sida ku qoran qoraallada Yooxanaa Kuwa aan Yuhuudda ahayn iyo Macallimiinta beenta ah labaduba waxa ay ka fallaagoobeen iftiinkii cad ee ay heleen. Taas weeye sababta ay fallaagonimadoodu u noqotay “dembi aan la qaadi karin” ama “dembiga dhimashada” (ka eeg tilmaanta 1 Yooxanaa 5:16). La yaabku waxa uu yahay in kuwo kale ay ku sababeen in ay u raacaan xagga burburka. Axdiga Cusubi si cad ayuu u sheegayaa in macallimiin been ah ay soo muuqan doonaan oo ay sababi doonaan dhibaatooyin waaweyn (cf. Matayos 7:15; 24:11, 24; Markos 13:22; 1 Yooxanaa 2:26; 3:7; 4:1).

▣ **“baa dunida u soo baxay”** aduunkaan waa dhulkaan aan hada ku nool nahay. Macallimiintaan beenaale yaashaane waa kuwo ka tagay kaniisada Masiixiyiinta (Fiiri. 1 Yooxanaa. 2:19) ama waa kuwo howl qaas ah hayo (Fiiri. 3 Yooxanaa).

▣ **“kuwa aan qiran”** Tanine waa horaah qalbiyan ah *homologeō* oo si maldahan ay dadku xirfad u leeyihiin iyo qirasho la qirto rumaysadka Masiixa la rumaysan yahay. (Fiiri. Mowduuca Qaaska ah ee qirashada ee Yooxanaa. 9:22-23).

▣ **“in Ciise Masiix jidh ku yimid”** Khaa’iniintaan waxay sii wadaan waxbaristooda beentaa ay uga sheegaan shaqsiyada Masiixa. Aayaddaan waxaa in badan kusoo noqnoqonaayo waano ah “tijaabiya ruuxyada” ee 1 Yooxanaa. 4:1-6, qaasatan marka ay la xariiraan Masiixa aadminimadiisa buuxda (Fiiri. Yooxanaa 1:14; Timoteyos. 3:16). Urur diimeed qaldan oo la yiraah Gnosticism ayaa waxay cadeeyeen Daa’animada labada jiritaan, ee u dhexeeyo “Ruux” (Ilaah) iyo “Maadada” oo ah (Jidhka) iyaga aragtidooda, Masiixu ma noqon karo bini aadam kaamil ah isla markaasne Ilaah kaamil ah.

Waxay u muuqataa in ay shuuciyiintaan figradooda qaldan ay ugu yaraan kasoo dhex burqanayso labo cilmi diimeed .

1. Inkiraad la diido Masiixa bini Aadamnimadiisa (bidco) wuxuu u muuqday bini aadamnimo laakiin ruux ayuu ahaa
2. Inkiraad la diido in masiixu ku dhintay isku talaabta; kooxdaan bidcadaa ayaa waxay u kala qaadeen in “Ruuxa Masiixa” uu kor yimid “Jirkii Masiixa” markii la babsiisay kana tagay intaanu ku dhiman isku talaabta ka hor

Waa suuro gal in FICILKAAN XAADIRKAA “jidh ku yimid” ay tahay siduu Yooxanaa ku diidaayay waxbaristan qaldan ee bidcada iyo 1 Yooxanaa. 4:1-6 waa siduu ku diidaayay fikrada kooxda kale iyaguna sida qaldan dadka wax u baraayay.

▣ **“Kaasu waa khaa'inka iyo ku Masiixa ka gees ah”** 1 Yooxanaa. 2:18 faraqa u dhaxeeya JAMACA “kuwa Masiixa ka geeskaa” iyo KELIGA “kan Masiixa ka geeskaa.” JAMACU” wuxuu yimid xiligii Yooxanaa waxayne ku haren Kaniisadaha (Fiiri. 1 Yooxanaa. 2:18), laakiin KELIGA waxaa loo sameeyay ama loogu talo galay mustaqbalka (Fiiri. “ninka sharci laawahaa” ee ku jira Tesaloniika. 2) si kastaba ha ahaatee, Aayaddaan, Kalmada Keli ahaantaa waxaa loo isticmaalay si Jamac ah 1 Yooxanaa. 2:18-25.

Aayadda. 8 “Iska jira” Tani waa ficil muujin ah . waa eray u taagan “ARAG” (*blepo*), waxaa loo isticmaalay calaamad digniin ah oo la iskaga digaayo xumaanta, (Fiiri. Matayos 2:44; Markos.13:5; Luukos.21:8; Falimaha Rasuullada.13:40; 1 Korintos 8:9; 10:12; Galatiya. 5:12; Cibraaniyada. 12:25). Muminiinta iyagaa ka masuul ka ah in ay xumaanta soocan sababtoo ah.

1. Waxay yaqaanin Injiilka
2. Waxay leeyihiin Ruuxda
3. Waxay xiriir joogtaa la leeyihiin Masiixa

▣

NASB. “si aydnaan u khasaarayn wixii aynu falnay”
NKJV. “si aanuu nooga dhummin wixii aan qabanay”
NRSV. “si aydaan u dhimin wixii aan qabanay”
TEV. “si aydnaan u waayin wixii aan qabanay”
NJB. “ama howsheenii oo dhan ayaa inaga dhumi doonta”

Aayaddaan waxaa ku jira qoraalo Giriig ah oo kala duwan oo la xariiro magac ulaalka ugu horeeyo: ma wuxuu noqon karaa “adiga” (NASB, NRSV, TEV) mise “anaga” (NKJV) ? qoraalka UBS wuxuu taageeraa “adiga” oo macnahu wuxuu tilmaamayaa in mumiintu aanay dhumin howsha ay tiigsanaayaan ee injiilka ee lagu siiyay marqaatifuryada rasuuladii.

▣ **“laakiinse si aad abaalgud dhan u heshaan”** waa ficil hore oo u rajayn ah kazoo kadaal u tilmaamaayo aqbalaadoodii injiilka. U rajayntani kuma xirna dhicitaankeedu rumaysadkooda, laakiin waa mid injiilka ay ku korayaan oo ay ku kordhayaan (Fiiri. 1 Korintos. 9:27; 15:10, , 14, 58; 2 Korintos. 6:1; Kolosay. 2:2; Filiboy. 2:16; 1 Tesaloniika. 2:1; 3:5).

Aayadda. 9.

NASB. **“Mid kasta oo dhaafa oo aan cilmiga Masiixa ku sii socon”**

NKJV. **“mid walba oo xad gudba kuna dhaqmin caqiidada Masiixa”**

NRSV. **“mid walboon ku dhaqmin wax baristii Masiixa”**

TEV. **“ ku walboon ku taagnaan wax barista Masiixa ee ka taga”**

NJB. **“hadii mid uun aanuu ku taagnaan wax barista Masiixa ee ka taga”**

Ugu horayntii, - arag isticmaalka dadban ee (*pas.*) injiilku wuxuu u wada yeerayaa dadka (oo dhan) laakiin waa nasiib daro oo weliba wado qaldan ah, ku dhaqanka wadadaan qaldan waxaa lagu shaqsiyadeeyay labo eray oo ficil xaadir ah: “Daba Mara” iyo “aan ku jirin.” Tan koowaad ee ah “daba maray” waxay noqon kartaa eray lagu qabanaayay macalimiintaan beentaa, waxay soo jeediyeen run dheeraad ka ah tii ay marqaatiga ka ahaayeen rasuuladii.

Mumiinta waxa lagu yaqaan ayaa ah runta ku jirta iyaga (Fiiri. Yooxanaa 8:31; 15:7; 1 Yooxanaa. 2:14, diidmadane waxay ku jirtaa Yooxanaa. 5:38; 1 Yooxanaa. 1:10). Fiiri mowduuca Qaaska ah ee Xalinta Yooxanaa 8:31 iyo caasiyiinta Yooxanaa. 6:64.

Naxwaha erayga “EE MASIIXA” waxaa loo isticmaali karaa

1. Wax baristii Masiixa
2. Waxbarisyo ku saabsan Masiixa
3. Labada macnoo guud oo Yooxanaa leeyahay

Naxwaha waa wax badan oo aan cadayn! Jumlada ay ku jirto oo kaliyah ayaa muujin karta ula jeeddada ama macnaha laakiin badana, sida meeshaan oo kale, xariir ayay la leeyihiin.

▣ **“kaasu Ilaah ma leh”** “cilmiga Masiixa” iyo “Runta” ee Aayadda 2 xiriir ayaa ka dhaxeeya. Beenaaleyaasha iyo xertooduba wax faa’iidaa ma heli doonaan (Fiiri. Aayadda 8). Waa kuwo si ruuxiyin ah u dhumay ee Ilaah ka fogaaday sababtoo ah in aabaha la addeecaa waxay ku xiran tahay in wiilka la addeecaa, (Fiiri. 1 Yooxanaa. 5:10-12). Istickmaalka erayga “leh” (labo mar, ayuu yahay mid tilmaame xaadir ah) Ilaah la jiro ama leh Aayaddaan oo keliyah ayay ku jirtaa iyo 1 Yooxanaa. 2:23.

Aayadda.10 “Haddii” Tani waa shardiga ugu horeeyo ee jumlada ee la filaayo in ay run ka tahay aragtida qoraaga ama sababaha wax qoristiisaba. In macalimiin beenaale yaal ah ay imaan doonaan !

▣ **“gurigiinna ha soo gelinina”** Tani waa ficil xaadir ah amarne ku jiro oo ay ku jirto amar diidmaa oo badanaa soo jeedinayso joojin ficil markaas socdo (xaalada waa in la maamulo).

“Gurigiina” waxaa kaloo lagu tilmaami karaa soo dhawaynta Masiixiyiinta (Fiiri. Matayos. 25:35; Rooma.12:13; 1 Timoteyos. 3:2; Tiitos. 1:8; Cibraaniyada.13:2; 1 Butros 4:9 ama 3 Yooxanaa 5-6), laakiin xaaladaa waxay si caadi ah u tilmaamaysaa kusoo dhawaynta kaniisada Masiixiyiinta u safray in ay injiilka dadka gaarisiyaan, si ay ula hadlaan kaniisada (Fiiri. Rooma.16:5; 1 Korintos.16:19; Kolosay.4:15; Felimon 2).

▣ **“hana salaamina”** Tanine waa ficil kaloo xaadir ah oo ay ku jirto fariin diidmaa. Naftiina ha ka dhigina “waxa lagu sheego in ay Masiixiyiin yihiin” waano walboo xernimo ayaa laga yaabaa in loo fahmo waayo si waafaqsan (Fiiri. Aayadda. 11). Oraahdaan waa mid aad u adag in la aqbalomaanta marka wax badan ayaa la iskugu tilmaamaa in masiixinimo tahay. Welina si aan iyaga aan ula wadaagno injiilka waxaa qasan ah in aan sheeko saaxiibtinimo fiican aan la yeelano marka hore. Weliba hoggaamiye diimeedyada Masiixiyiinta waa in ay ka taxadiraan oo ay iska ilaalshaan wax walboo sababi karo bidcinimo. Tani dabcan ma saameenayso caqiidada Masiixinimada!

NASB (UPDATED) TEXT: 12-13

¹²In kastoo aan hayo wax badan oo aan idiin soo qoro, ma aan jeclayn inaan warqad iyo khad idiinku soo qoro; laakiinse waxaan rajaynayaa inaan idiin imaado oo aan afkayga idinkula hadlo, si ay farxaddiinnu u buuxsanto. ¹³Carruurtii walaashaada la doortay way ku soo salaamayaan.

Aayadda.12 “aan hayo wax badan oo aan idiin soo qoro” Tani waxay la mid tahay dhamaadka 3 Yooxanaa 13-14.

▣ “**farxaddiinnu u buuxsanto**” Tani waa ficil tilmaame dadban ah ee sabab ku salaysan , muuqaal kale waa ud guud ahaan ku jira Yooxanaa (Fiiri Yooxanaa 3:29; 15:11; 16:24; 16:24; 16:24; 17:13; 1 Yooxanaa. 1:4). Farxadaa waxay ku tirsan tahay ama ay ku salaysan tahay

1. Joogitaanka macalinka

2. Aqoonta Runtaa ee uu keenay

Yooxanaa wuxuu aayadda 4 aad ku tilmaamay “farxad” hadii lagu sii socdo jacaylka iyo addeecista.

Aayadda. 13 Aayaddaan waxay la mid tahay Aayadda 100 la isticmaalay luuqad calaamad ah si looga hadlo kaniisad kaloo walaasha lagu magacaabay iyo xubnaheeda oo dhan.

SU’AALO FALANQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeen kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Liis gali sedexda tijaabood oo ku jira 1 Yooxanaa ee hadane ku noqday 2 Yooxanaa.

a.

b.

c.

2. Carafkaan ma waxaa loo qoray Marwada mise kaniisada?

3. Sideed ku oraaahdaan gaaban aad uga ogaan kartaa in bidcinimo ay ku dhex jirto shacabka?

4. Waa maxay ama waa kuma Khaa’iinka iyo kan Masiixa ka geeskaa ee ku jira Aayadda. 7?

5. Aayadda 10 iyo aayda 11 miyay iskaoo horjeedaa dhaqanka injiilka ee ah in la soo dhawooyo oo xataa la jeclaado cadowyadeena?

III YOOXANAA

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS ⁴	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Salaan	Salaantii Gayos		Hordhac	Address iyo salaamo
Aayadda. 1	Aayadaha. 1-4	Aayadda. 1	Aayadda. 1a Aayadda. 1b	Aayadaha. 1-4
Aayadda. 2-4		Aayadaha. 2-4	Aayadaha. 2-4	
Wada shaqayn iyo Iska soo hor jeed	Waxaa la amray Naxariis		Gayos oo la ammaanay	
Aayadaha. 5-8	Aayadaha. 5-8	Aayadaha. 5-8	Aayadaha. 5-8	Aayadaha. 5-8
	Diyotrefees Deemeetriyos		Diyotrefees Deemeetriyos	Ogsoonaada Tusaalaha Diyotrefees
Aayadaha. 9-10	Aayadaha. 9-12	Aayadaha. 9-10	Aayadaha. 9-10	Aayadaha 9-11
Aayadaha. 11-12		Aayadaha. 11-12	Aayadda. 11 Aayadda. 12	Ammaantii Deemeetriyos Aayadda 12
Salaamihii Ugu Dameeyay	Salaan Sagootis ah		Salaamihii Ugu Dambeeyay	Epilogue
Aayadaha. 13-15	Aayadaha. 13-15	Aayadaha. 13-14 Aayadda. 15	Aayadaha. 13-14 Aayadda. 15a Aayadda. 15b	Aayadaha. 13-15

AKHRINTA TAXANAHA KOOBAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Kitaabka oo dhan waxa aad ku akhridaa hal kal fadhi, waxaanad lasoo baxdaa oo ereyadaada ku cabirtaa ujeedada gebi ahaanba kitaabku ka hadlyo

1. Ujeedada gebi ahaanba kitaabka
2. Qaabka qoraalkiisa (nooca)

AKHRINTA TAXANAHA LABAAD

Tani waa waxbarasho ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Marlabaad kitaabka akhri waxaanad soo saartaa ujeedada muhiimka ah adigoo ku cabiraya hal jumalada.

1. Cinwaanka cutubka kowaad
2. Cinwaanka cutubka labaad
3. Cinwaanka cutubka saddexaad

4. Cinwaanka cutubka afraad

5. Iwm.

AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga v)

ADIGA OO RAACAYA UJEDKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafsiiri lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiirka. Waa in aadan midan ula tegin qof kuu tafsiira.

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

9. Baaragaraaf-ka koowaad
10. Baaragaraaf-ka labaad
11. Baaragaraaf-ka saddeexaad
12. IWM.

SOO KOOBID FIQI AHAANEED EE III YOOXANAA HORDHAC

- A. Warqaddan yar waxaa cinwaan looga dhigay III Yooxanaa Maxaa yeelay waa ay ka yar tahay II Yooxanaa. Waxaan u malaynayaa in II Yooxanaa iyo III Yooxanaa ay labaduba xambaarsan `yihiin farriin siman oo ku socota kaniisad degaameed, ugu dhawaan ku taal Gobolka Rooma ee ee Aasiyada yar, oo ku began dhammaadkii qarnigii koowaad.
- B. II Yooxanaa waxa uu qaabaynayaa dhibaataada kuwa aan diinta lahayn, ee wacdiyeyasha socdaalka ah, halka III Yooxanaa uu ka hadlayo canaanashada wacdiyeyasha socotada ah ee ah Masiixiyiinta.
- C. Waxaa jira saddex `nin oo si gaar ah loogu magacaabay III Yooxanaa dhexdiisa.
 1. Gayos (nin Ilaah oo ku jira kaniisadda wax helaysa)
 - a. Waxaa jira saddex Gayos oo lagu sheegay qaybo kale oo baybalka la mid ah: Gayos-kii reer Makadoniya, Falimaha Rasuullada 19:29; Gayos-kii Derbe, Falimaha Rasuullada 20:4; iyo Gayos-kii Korintos, Rooma 16:23; I Korintos 1:14.
 - b. Qoraallada loo yaqaan “Xeerarka Rasuullada” Gayos-ka ku jira III Yooxanaa waxa uu diiwaanka ugu jiraa in uu yahay Biishoobka Bergumam, kaasoo uu Yooxanaa magacaabay.
 2. Diyotrefees (dhib-sameeye aan Ilaah aqoon oo ku jira kaniisadda wax helaysa)
 - a. Tani waa meesha qura ee lag usheegay ninkan Axdiga Cusub dhexdiisa. Magaciisu waa mid aad dhif u ah oo macnihiisu yahay “Kii uu Zeus Daryeelay.” Alla maxay wax lagu jeesjeeso tahay ninkaas magaciisa la raaciyey “Zeus” kaasoo ka soo hor jeesan lahaa masaafurka markaasoo “Zeus” uu ahaa “difaacaha masaafurka.”
 - b. Dareenkiisa waxaa lagu qeexay aayadaha 9-10.
 3. Deemeetriyos (kan warqadda Yooxanaa u qaadaya macbud deegaameedkan)
 - a. Waa caddahay in uu ka mid yahay adeegayaashii masaafurka ahaa iyo sidihii warqaddii Yooxanaa ee Efesos.
 - b. Dhaqanka lagu magacaabo “Xeerarka Rasuullada” waxa uu Deemeetriyos diiwaanka ugu jiraa in uu yahay Biishoobka Fildelfiya, kaasoo uu Yooxanaa magacaabay.
- D. Kaniisaddii Hore waxa ay la halgantay sidii qiimayn iyo kaalmo loo siin lahaa wacdiyeyasha/macallimiinta iyo gaadhsiiyayaasha. Qoraal aam Kan Masiixiyadda ahayn oo qarnigii labaad horraantiisii ah looguna yeedho *The Didache ama Wax-bariddii Laqbo iyo Tobankii rasuul ayaa bixinaya tilmaamahan:*

CUTUBKA IX—OO KHUSEEYA MACALLIMADA, RASUULLADA, IYO NEBIYADA

“Ku kastoo, sidaas daraaddeed, yimaadda oo idin bara waxyaabahan oo dhan ee horay loo yidhi, qaata isaga. Balse haddii macallinku naf ahaantiisu u weeciyo madhabta dhanka burburka ee midan, ha maqlina; laakiin *haddii uu u baro* in uu sare ugu qaado xaqnimada iyo aqoonta Rabbiga, u qaata sida

Rabbiga. Laakiin rasuullada iyo nebiyada, idinkoo idinkoo eegaya darajada Injiilka, qaata: Rasuul walba oo idiin yimaadda u soo dhaweeya sida Rabbiga. Laakiin in uusan joogin hal maalin *mooyaane*; laakiin haddii baahiyo jirto; haddana tan labaad; laakiin haddii uu saddex maalmood joogo, isagu waa nebi been ah. oo markii uu rasuulku tago, ha u oggolaanina in uu wax qaato, oo aan ka ahayn kibis illaa uu hodheel ka dego; laakiin haddii uu lacag weyddiisto, isagu waa nebi been ah” (bogga 380).

CUTUBKA XII—SOO DHAWAYNTA MASIIXIYIINTA

“Laakiin ku kastoo Ruuxa shexdiisa ku sheega, lacag isiiya, ama wax kale, ha dhegaysanina isaga; laakiin haddii uu idinku yidhaa u bixiya kuwa kjale ee baahan, cidina yeysan xukumin isaga. Laakiin qof kasta oo ku yimaadda magaca Rabbiga aqbala, oo wax yar dabadood waad aqoon doontaan oo garan doontaan; sida aad u lahaataan fahan bidix iyo midig. Haddii qof sidii socoto u yimaaddo, caawiya intii aad awoodi kadhaan; laakiin waa in uusan idinla joogin labo ama saddex maalmood mooyaane, haddii baahi jidho. Laakiin haddii doonistiisu tahay in uu idinla jiro, oo uu shaxamiiste noqonayo, u oggolaado in uu shaqeeyo oo wax cuno; laakiin haddii uusan lahayn waxa ganacsi ah idinkoo fahankiinna Masiixi ahaan u eegaya, waa in uusan shaqo la’aan idinkula noolaan. Laakiin haddii uusan doonayn in uu sidaas sameeyo. Kuwa sidaa ah ka ilaaliya kibista” (bogga. 381).

BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

NASB (UPDATED) TEXT: AAYADDA 1

¹Anigoo odayga ah waxaan warqaddan u qorayaa gacaliye Gayos oo aan runta ku jeclahay.

Aayadda. 1 “odayga” Ereyga oday ama odayga waxa ay sami yihiin ereyga “wadaad” “Biishoob” (cf. Tiitos 1:5, 7; Falimaha Rasuullada 20;17, 28). Tusaale buuxa waxa aad ka eegtaa II Yooxanaa aayadda. 1.

▣ “**jeclahay**” Kani waa qaab ay Yooxanaa warqadihiisu leeyihiin (cf. I Yooxanaa 2:7; 3:2, 21; 4:1, 7, 11; III Yooxanaa 1, 2, 5, 11), laakiin loogama arkayo magac ahaan Injiilka iyo Muujinta.

▣ “**Gayos**” Wada hadal badan aya ka taagnaa Gayos iyo Diyotrefees midka ah wadaadka kaniisad deegaameeddan. Way adag tahay in hadal toos ah laga bixiyo warbixintan yare e la hadli karo. marka la eego aayadda 9, halkaasoo “kaniisadda” iyo “iyaga” lagu sharraxay, waxaa laga yaabaa in Diyotrefees uu ahaa hoggaamiye hal kanniisad guri Gayos-na uu ahaa hoggaamiye hal kaniisad guri oo aad isugu dhawaa, laakiin tani waa malo nadiif ah.

▣ “**oo aan runta ku jeclahay**” “jacayl iyo run” waxaa had iyo jeeraale wadajidh looga `hela warqadaha Yooxamaa (cf. II Yooxanaa 1, 2, 3, 4; III Yooxanaa 1, 3, 4, 8, 12). Runtu waxa ay la xidhiidhi kartaa

1. Ruuxa Qudduuska ah (cf. Yooxanaa 14:17)
2. Ciise oo ah Wiilka (cf. Yooxanaa 8:32; 14:6)
3. Taxa Injiilka (cf. I Yooxanaa 2:2; 3:23)

NASB (UPDATED) TEXT: 2-4

²Gacaliyow, waxaan kuugu duceeyaa inaad wax kasta ku liibaantid oo aad caafimaad qabtid siday naftaadu u liibaansan tahay. ³Waayo, aad baan ugu farxay markii walaalo yimaadeen oo ka markhaati fureen runtaada iyo sidaad runta ugu socotid. ⁴Ma lihi farxad tan iiga weyn inaan maqlo in carruurtaaydu ay runta ku socdaan.

Aayadda. 2. “**duceeyaa**” Tani waxa ay raacsan tahay nooca ereyga furitaanka. Waa duco ama doonis ah lagu rabo barwaaqada iyo caafimaadka kuwa wax helaya ama xertan meesha joogta. Waxa uu ahaa hab lagu salaami jiray kuwa la jecel yahay. Looma adeegsan karo qoraal caddaynayo “caafimaad iyo badhaadhe Injiilka ah,” sida Maraykanka Caanka ka ah. Eeg buugga Gordon Fee (oo ah qabiir sare), *The Disease of the Health, Wealth Gospel*. Aragtiyadayda ku aaddan bogsiinta, fadlan ka eegta tusaalooyinka aan ku qoray Yacquub 5 ee website-ka www.freebiblecommentary.org.

▣ **“inaad wax kasta ku liibaantid oo aad caafimaad qabtid”** Tani waa salaam ka jirtay dunidii Giriigga iyo Roomaanka qarnigii koowaad. Looma adeegsan qoraal caddaynaya “caafimaad iyo badhaadhe ah,” u ahaanaya wacdiyeyasha. Qoraal kitaabka laga soo qaaday ayaa loo adeegsan karaa in wax lagu tilmaamo. Qoraalka maanta ma macnaynayo wax uusan muujin maalintiisii u gaarka ahayd. Ninkii loo waxyooday ayaa ah qoraageeda asalka ah. Waa in aan raacnaa fikirradiisii, ee ma aha in aan sideenna isaga male awaalanno!

▣ **“naftaadu”** Ereygan “*psuche*” ama (naf) waxa uu ugu dhawaan la siman yahay “*pneuma*.” Waxaa loo adeegsadaa in lagu tilmaamo jiritaanka shaqsinimada qofka. Lama xidhiidho. Tilmaami mayso qayb nin oo la takooray (jidh, naf, ruux). Aadanuhu waa ay isku xidhan yihiin (Bilowgii 2:7). Waxaannu nahay naf: ee naf ma annu lihin.

Aayadda. 3. “aad baan ugu farxay” (cf. II Yooxanaa 4; Filiboy 4:10).

▣ **“yimaadeen oo ka markaati fureen”** Labadan erey ee heerka saddexaad ee falka tegay ah kuwaasoo tilmaamaya in

1. Xubno kaniisaddan ka mid ah ay si joogto ah ugu safreen Efesos oo ay war bixin Yooxanaa siiyeen
2. In adeegayaashii soo laabtay ay Yooxanaa u soo tebiyeen Gayos liibaantiisa

Sida macquulka ah Yooxanaa, oo nin duqa ah, si fudud uma uusan safri Karin, laakiin wuu jeclaa in uu maqlo xaaladda iyo koritaanka kaniisadaha.

▣ **“runta ugu socotid”** Weedhani waxa ay fiqi ahaan la siman tahay “iftiinka ku dhex socotid” (cf. I Yooxanaa 1:7). Masiixiyaddu ma aha qodob diimeed, dabecad, ama xeer lagu xidhmayo, laakiin nolol xidhiidh lagula noolaanayo Ciise Masiix. Kaniisaddii hore waxaa loogu yeeray ama lagu magacaabay “waddada” (cf. Falimaha Rasuullada 9:2, 19:9, 23; 24:22). Runtu ma aha oo keliya xilkasnimo lagu qanco, laakiin sidoo kale waa xidhiidh (marka koowaad lala yeelanayo Ilaah noona soo maraya Ciise Masiix natiijadiisuna noqonayso in midba midka kale jeclaado). Mawduuc Gaar ah oo ku saabsan Runta ka eeg: Yooxanaa 6:55 iyo 17:3.

Aayadda. 4. “carruurtaaydu” Kani waa magac guud oo ku jira Yooxanaa warqadihiisa (cf. I Yooxanaa 2:12, 13, 18, 28, ; 3:7, 18; 4:4; 5:21). Xoojinta meeshan ku jirta waxa ay ku aaddan tahay (1) Yooxanaa awooddiisa nabi ahaaneed ama (2) jacaylka uu Yooxanaa u qabo kaniisadaha iyo Masiixiyiinta Gobolka Roomanka ee Aasiyada yadh (galbeedka Turki), ee ahayd hadlkii maalmihiisii ugu dambeeyay ee adeegga ku qaatay.

NASB (UPDATED) TEXT: 5-8

⁵Gacaliyow, aaminnimaad ku samaysaa shuqul kasta oo aad u samaysid walaalaha iyo shisheeyahaba. ⁶Iyagu jacaylkaagay kiniisadda horteeda kaga markaati fureen. Wanaag baad samayn lahayd haddii aad iyaga u ambabixisid sida Ilaah istaahilo; ⁷maxaa yeelay, magiciisa aawadiis ayay u ambabexeen iyagoo aan waxba ka qaadan dadka aan Yuhuudda ahayn. **8** Sidaas daraaddeed waxaa inagu waajib ah inaynu kuwaas oo kale soo dhowayno, si aynu u noqonno kuwa runta kala wada shaqeeya iyaga.

Aayadda. 5. “aaminnimaad ku samaysaa” Ficilladan uu samaynayo Gayos si dhab ah ayey uga soo hor jeedaan ficillada Diyotrefees sida ku jirta aayadaha 9-10. Ka eeg Mawduucyada gaarka ah: Rumayn, aamminid, rumaysad, iyo rumaysnaanta sida ku jirta Yooxanaa 1:7 iyo Yooxanaa 1:14.

▣ **“shuqul kasta oo aad u samaysid”** Kani waa magac u yaal loo tiriyo ama loo nisbaynayo oo uu la socdo fal tegay oo heerka labaad ah oo muujinaya xaalad natiijadeedii la ebyay ama la kaamilay. Gayos waxa uu caawiyey adeegayaashii musaafiriinta ahaa si kastoo uu ku caawin lahaa iyo wax kasta oo macquul ah oo uu ku caawin lahaa.

▣ **“walaalaha iyo shisheeyahaba”** Kaniisaddu waxa ay soo dhawaynaysay oo ay taageeraysay masiixiyiintan qariibka ah, laakiin xaaladda deegaanka awgeed, Gayos oo keliya ayaa caawinayey walaalahaan uusan waxba ka aqoon marka laga reebo in iyaguba ay garanayeen, oo ay u adeegayeen, oo ay jeclaayeen Ciise Masiix.

Aayadda. 6. “Iyagu jacaylkaagay kiniisadda horteeda kaga markhaati fureen” Waxaa cad in kaniisaddii hore eek u tiillay Efesos ay lahayd waqti adeeg war bixin xilliga ka wada shaqaynta caabudaadda.

MAWDUUC GAAR AH: KANIISAD (EKKLESIA)

Erayga Giriigga ah ee *ekklesia* wuxuu ka yimid labo eray, “banaan” iyo “yeedhay,” haddaba, macno ahaan waxa weeyi kuwa loo yeedhay. Kaniisaddii hore waxay eraygan kasoo qaateen adeegsi caadi ah (Falimaha Rasuullada 19:32,39,41). Maadaama oo adeegsiga Septuagint ee eraygani ahaa “uruuritaan” xagga Israa’iiliyiinta (Tirintii 16:3; 20:4). Waxay u adeegsadeen sidii iyaga oo sii wada dadkii Axdiga Hore ee Ilaah. waxay ahaayeen Israa’iisha cusub (Rooma 2:28-29; Galatiya 6:16; 1 Butros 2:5,9; Muujintii 1:6), ahna dhammays tirka ujeeddada Ilaah ee ku waajahan dunida (Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5-6; Matayos 28:18-20; Luukos 24:47; Falimaha Rasuullada 1:8).

Eraygan siyaabo kala duwan ayaa marar badan loogu dhex adeegsaday Injiillada iyo Falimaha Rasuullada

1. Kulan caadi ah, Falimaha Rasuullada 19:32,39,41
2. Dadka Masiixiyiinta ah ee Ilaah, Matayos 16:18 iyo Efesos
3. Kulanka Masiixiyiinta, Matayos 18:17; Falimaha Rasuullada 5:11 (kaniisadda Yerusaaalem sida aayadahan ka muuqata)
4. Isu imaatinka dadkii Israa’iil, Falimaha Rasuullada 7:38, Istifaaniyoos.
5. Dadka Ilaah ee ku sugan gobol, Falimaha Rasuullada 8:3 (Yuhuudiya amaba Falastiin).

▣ **“Wanaag baad samayn lahayd”** Kani waa hadal sarbeebed Giriig ah oo laga helay Warqadaha Masaarida (ka eeg Moulton iyo Milligan, *The Vocabulary of Greek Testament*) ee xagga “fadlan” (cf. Falimaha Rasuullada 10:33).

▣ **“aad iyaga u ambabixisid”** kani waa hadal sarbeebed farsamo oo qalabayn ah, iyo duco, iyo in la siiyo baahiyada adeegayaasha socotada ah (cf. Falimaha Rasuullada 15:3; Rooma 15:24; I Korintos 16:6; II Korintos 1:16; Tiitos 3:13).

▣ **“sida Ilaah istaahilo”** Tan macnaheedu waxaa weeye hab jacayl, muhiimad, iyo qiimo leh (cf. Kolsay 1:1;; I Tesaloniika 2:12). Rumaystayaashu waa in ay kuwa Injiilka u adeegaya ula macaamilaan hab faa’iido u leh ka ay u adeegayaan (oo ah Ciise Masiix) (cf. Efesos 4:1).

Aayadda. 7

NASB, REB	“way ambabaxeen”
NKJV	“horeey u baxeen”
NRSV	“socdaalkoodii ayey bilaabeen”
TEV, NJB	“way baxeen”

Ereygan caanka ah waxaa loo adeegsaday

1. Macallimadii beenta ahaa oo ka tegaya kaniisadda sida ku qoran I Yooxanaa 2:19
2. Nebiyadii beenta ahaa oo u baxaya adduunka sida ku qoran I Yooxanaa 4:1
3. Qaa’imiin badan oo u baxaya adduunka sida ku qoran II Yooxanaa aayadda. 7
4. Marqaatiyaasha rasuullada oo u baxaya (adduunka) sida ku jirta III Yooxanaa aayadda. 7

▣

NASB	“Magaca awgiis”
NJKV	“magaciisa aawadiis”
NRSV	“Masiixa aawadiis”
TEV	“u adeegidda Masiixa”
NJB	“gebi ahaanba magaca aawadiis”

Kani waa tusaale ah “magaca” oo u taagan qofka iyo shaqada Ciise Masiix. Sida ay rumaystayaashu ugu rumaysan yihiin Magaciisa (cf. Yooxanaa 1:12; 3:18; Rooma 10:9; I Korintos 12:3; Filiboy 2:9-11), waxaa lagu cafinaayaa Magaciisa (I Yooxanaa 2:13), oo waxa ay sidoo kale wax ku samayanayaan Magaciisa awgiis (cf. Matayos 10:22; 24:9; Markos 13:13; Luukos 21:12, 17; Yooxanaa 15:21; 20:31; Falimaha Rasuullada 4:17; 5:41; 9:14; Rooma 1:5; I Butros 4:14, 16; Muujintii 2:3).



NASB “Iyagoo aan waxba ka aqbalayn kuwa aan Yuhuudda ahayn”
NKJV “iyagoo aan waxba ka qaadan dadka aan Yuhuudda ahayn”
NRSV “iyagoo aan taageero ka aqbalayn kuwa aan rumaysadka lahayn”
TEV “iyagoo aan caawimaadna ka aqbalayn rumaysad laawayaasha”

Weedhani waxa ay tilmaamaysaa marqaatiyadan Ilaah ku aamminaya hawshiisa, si la mid ereyadii sidii ay labo iyo tobankii sida ku jirta Matayos 10:5-15 iyo toddobaatankii sida ku jirta Luukos 10:4-7.

Adeegsiga ereyga “kuwa aan Yuhuudda ahayn” waxa uu ahaa tilmaan loo adeegsan jiray kuwa aan rumaysadka lahayn iyo diin-laawayaasha oo qarnigii koowaad la isticmaali jiray (cf. Matayos 5:47; I Butros 2:12; 4:3). Rumaystaashu waa in ay taageeraan shaqada Injiilka! Kii mid caawiyaahi qalbigiisuu helaa.

Waqtigii Yooxanaa macallimmo safra ayaa waxa ay dadka wax ku bareen magac iyo lacag. Macallimada, wacdiyayaasha, iyo adeegayaasha Ilaah waxa ay ahayd in la caawiyo, ma aha ereyadooda, laakiin shaqadooda ay u hayaan Rabbiga ay adeegyiisa sida naf huridda leh ay uga qayb qaadanayaan.

Aayadda. 8 “waxaa inagu waajib ah” Tani waa digniin niyad ahaaneed, oo marar badan lagu soo celceliyey ama lagu noqnoqday (cf. Yooxanaa 13:14; 19:7; I Yooxanaa 2:6; 3:16; 4:11). Ereyga *opheilo* suugaan ahaan macnihiisu waxaa weeye dayn xag kharash ah oo lagu jiro, laakiin waxa ay noqotay in loo isticmaalo maldahaad ahaan in shuruud ama qaan ama dayn loogu qof.

▣ **“inaynu kuwaas oo kale soo dhowayno”** Soo dhawayntu waxa ay ahayd arrin aad muhiim ugu ah kaniisaddii hore iyadoo xaaladaha niyad ahaaneed ee laga xumaado ay ahaayeen kuwo ka jira hodheellada deegaanka (cf. Matayos 25:35; Rooma 12:13; I Timoteyos 3:2; 5:10; Tiitos 1:8; Cibraaniyada 13:2; I Butros 4:9).

▣ **“si aynu u noqonno kuwa runta kala wada shaqeyya iyaga”** Sida ay rumaystayaashu u caawinayaan adeegayaasha Ilaah, ayey iyaguna ugu jiraan shaqadooda rumaysadka iyo runta. Kani waa amarka Injiilka! Hagatusaaloooyinka Axdiga Cusub ee wax bixinta Masiixiga waxaa laga helayaa II Korintos 8-9.

NASB (UPDATED) TEXT: 9-10

⁹Wax baan kiniisadda u soo qoray, laakiinse Diyotrefees oo jecel inuu iyaga ka sarreeyo, na aqbali maayo. ¹⁰Sidaas daraaddeed, haddaan imaado, waxaan xusuusin doonaa shuqulladiisa uu sameeyo isagoo hadallo xunxun nagu shubaya. Taasu kuma filla isaga, mana aqbalo walaalaha, kuwii aqbali lahaana wuu u diidaa, kaniisaddana wuu ka eryaa

Aayadda. 9 “Wax baan kiniisadda u soo qoray” Waxaa laga yaabaa in tani ay tilmaamayso I ama II Yooxanaa ama warqad luntay; laakiin sideeda badan waxa ay tilmaamaysaa II Yooxanaa. Mawduuc Gaar ah: Kaniisadda (*Ekklesia*) ka eeg aayadda. 6.

▣ **“Diyotrefees oo jecel inuu iyaga ka sarreeyo”** Tani waa qayb fal taagan oo toosan ah. Waa erey isku xidhan “jacayl” (*phileō*) iyo “in uu qaato billadda koowaad” (*prōteuō*). Axdiga Cusub dhexdiisa halkan oo qura ayaa lagu isticmaalayaa, laakiin ereyga labaad waxaa lagu isticmaalayaa Kolosay 1:18 oo ah billadda ugu horrausa ee Masiixa. Ninkani waa kan ugu horreeya ee loo diwaan geliyey in uu yahay “dillaalka awoodda” ama “Taliye kaniisad.” Ma garanaynno in uu ahaa wadaad ama in uu iska ahaa nin aan taqasus lahayn. Arrintu si kastaba ha ahaatee tani waxa ay muujinaysaa ujeedooyinkiisa. Qofka noocan oo kale ah ee udub dhexaadka u ah kaniisadda fac kasta ayaa laga helaa! In uu xitaa ahaa Gnostic waa mid aan la hubin oo aan caddayn, balse laga yaabee.

James Dunn, *Unity and Diversity in the New Testament*, boggiisa. 392, waxa uu Diyotrefees u arkaa in uu tusaale u yahay “Haniisaddii Hore ee kaatooligga.”

“si gaar ah oo macquulsan ayaa Yooxanaa shaqsinimadiisa si macquul ah loofu fahmi karaa si la mid ah *gadoodka* looga soo hor jeedo nooca dhaqdhaqaaqa shacabka sida caddaynta ka muuqata daaqa (ka eeg meesha kore ee bogga 129f., cf. haddana Cibraaniyada iyo Muujintii§§31.2, 3). Sidoo kale qoraallada Yooxanaa waxa ay u muuqdaan haddiiba wax laga soo hor jeesanayo in ay yihiin nooca caadada ee horay sida muuqata loogu aasaasay Kaatooliggii hore ee Ignatius (‘dawada damaca’ – Eph., 20.2) (kor ka eeg 41). Waxa ugu badan ee dhammaan loo riyaaqay waa weeraarka ‘hoggaamiyaha’ ee Diyotrefees sida ku jirta III Yooxanaa 9f. Diyotrefees wuxuu si muuqata u hayey awoodda kaniisaddiisa ugu yaraa: ma ahayn oo qura in

uu awooday in uu diido soo dhawaynta Masiixiyiinta soo booqanaysa, laakiin sidoo kale ‘kaniisadda ayuu ka eryayaa’ kuwa isaga soo dhaafa. Marka si kale loo dhaho, Diyotrefees, waxa uu wax la samaynayey xukunka amarka biishoobka (cf. Ignatius, Eph, 6.1; Trall, 7.2; Smyen., 8.1f), oo way ka soo hor jeeday rabitaanka wacdiga muuqda iyo awoodda (*phioproteuon*) ee ‘hoggaamiyuhu’ qoray. Haddii si kale loo dhaho, oo laga soo qaado in III Yooxanaa ay ka timid isku meel sida I Yooxanaa iyo II Yooxanaa, sida ugu fiican ee loo arkayaahi waa ka jawaabista nooca xeerka ama xeerka Masiixiyadda, ka hor imaanshaha xeerka iyo wanaagga shaqsiyadda, oo looga gadoodsan yahay saamaynta hordhaysa ee Katooliggii hore.”

▣ **“na aqbali maayo”** Ma aha oo qura in Diyotrefees diiday awoodda rasuul ahaaneed ee Yooxanaa, laakiin wuxuu si adag ugu lug lahaa diidista siyaasadda Nebi ahaaneed iyo in uu wax u geysto kuwii raaci lahaa!

Aayadda. 10 “Haddii” Tani waa jumlad xaaladeed heerka saddexaad ah oo macnaheedu yahay ficil suuragal ah.

▣ **“waxaan xusuusin doonaa shuqulladiisa”** Yooxanaa waxa uu doonayaa in uu si cad u qeexo ninkan ujeedooyinkiisa (cf. aayadda. 9) iyo ficilladiisa (cf. aayadda. 10):

1. NASB – “isagoo si aan caddaalad ahayn noogu eedeenaya ereyo shar ah”
NKJV – “isagoo hadallo xunxun nagu shubaya”
NRSV – “isagoo eedaymo been ah naga faafinaya”
TEV – “waxyaabaha xun-xun ee uu naga sheegayo iyo beenta uu naga sheegay”
NJB – “dacwadaha xun-xun ee uu nagu meegaarayo isagoo nooga soo hor jeedo”
2. “isaga qudhiisuj ma helayo walaalaha”
3. “wuu manmuucayaa kuwaa iyagu raba *in ay sidaas yeelaan*”
4. “kaniisadda ayuu iyaga ka saarayaa”

Ninakni waxa uu doonayaa digtoonaa oo cidna lama wadaagi doono iftiinka ereyga. Sidoo kale ninkii ka soo hor jeesta ee raaci waaya isaga waa ka eryayaa kaniisadda.

▣ **“kaniisaddana wuu ka eryaa”** Ereygan fal sameeyaha ah (*ekballō*) ee xooggan waxa uu ku jiraa Yooxanaa 9:34, 35 markaasoo ay ninkii indhaha la’aa ee uu Ciise bogsiiyey laga soo saaray sunagoga.

Waxaa sidoo kale loo adeegsaday jin la saaray sida ku jirta Yooxanaa 12:31.

NASB (UPDATED) TEXT: 11-12

¹¹Gacaliyow, ha ku dayan waxa sharka ah, laakiinse ku dayo waxa wanaagsan. Ka samo falaa waa ku Ilaah, ka shar falaase Ilaah ma uu arkin. ¹²Dadka oo dhammu way u markhaati furaan Deemeetriyos, runta qudheedu way u markhaati furtaa, annaguna waannu u markhaati furnaa, waanad og tahay in markhaatifurkayagu run yahay.

Aayadda. 11 “ha ku dayan waxa sharka ah” Kani waa fal jooga oo heerka dhexe ah oo amar ah oo inta badan tilmaamaya in la joojiyo ficil socda ama la samaynayo. Afka Soomaaliga waxa ay sidoo kale ahaan kartaa “iska dhig-dhigid” oo Afka Giriiggana ku ah (*mimeomai*). Waa in aan si feejignaan leh uga tigtoonanno kuwa annu ku dayanaynno. Waa in ay noqdaan Masiixiyiin kaniisadda dhexdeeda qaangaadh ku ah (cf. II Tesalonika 3:7, 9; Cibraaniyada 6:12; 13:7). Deemeetriyos waa tusaale wanaagsan, Diyotrefees-se waa tusaale xun.

▣ **“Ka samo falaa waa ku Ilaah”** Waraaqaha Yooxanaa waxa ay leeyihiin saddex tijaabo oo uu qofku ku garan karo in ay Masiixiyiin yihiin. Tani waxa ay tilmaamaysaa tijaabada adeecista (cf. I Yooxanaa 2:3-6, 28-29; 3:4-10; 5:18; II Yooxanaa 6). Sidoo kale waxaa jira tilmaamo ku aaddan labada kale: (1) mad’habta (aayadaha. 3-4) iyo (2) jacayl (aayadaha. 1, 2.6).

▣ **“ka shar falaase Ilaah ma uu arkin”** Macallimiintii beenta ahaa waxa ay ku doodeen in ay si dhab ah u yaqaannaan Ilaah laakiin waxa ay ku noolaayeen nolol Ilaah la’aan iyo jacayl la’aan. Tani waxa ay la mid noqonaysaa kuwii Gnostic-ga ahaa ee rumaysnaa in badbaadadu aya tahay run indheer-garadnimo oo lagu adkaysanayo laakiin aysan xidhiidh la lahayn nolol maalmeedka.

Aayadda. 12 “Dadka oo dhammu way u markhaati furaan Deemeetriyos” Kani waa fal tegay oo aan toosnayn. Tani waxa ay sida runta ah u muuqataa in ay tahay warqad talo bixin ah oo ka timid Yooxanaa kuna socota Gayos oo ku saabsan adeegaha la yidhaa Deemeetriyos, kaasoo ah kan warqaddan II Yooxanaa u keenay

Gayos. Waraaqo kale oo talo bixin ah oo ku jira Axdiga Cusub, ka eeg Falimaha Rasuullada 18: 27; Rooma 16:1; I Korintos 16:3; II Korintos 3:1; 8:16-24; Kolosay 4:10.

▣ “, **runta qudheedu**” Runtu (Mawduuc Gaar ah: ka ee Yooxanaa 6:55 iyo 17:3) waxaa si gaar ah shaqsi looga dhigay in ay u marqaati furayso Deemetriyos marqaatifurkiisa wabaagsan.

▣ “**waanad og tahay in markhaatifurkayagu run yahay**” Yooxanaa waxa yy tilmaamayaa sida naf ahaantiisu aamminka ugu yahay marqaatifurka Masiixa (cf. Yooxanaa 19:35; 21:24).

NASB (UPDATED) TEXT: 13-14

¹³Waxaan hayay waxyaalo badan oo aan kuu soo qoro, laakiinse dooni maayo inaan qalin iyo khad kuugu soo qoro. ¹⁴laakiin waxaan rajaynayaa inaan dhowaan ku arko, oo aynu afkeenna iskula hadli doonno. Nabadu ha kula jirto. Saaxiibbadii way ku soo salaamayaan. Saaxiibbada igu salaam mid kasta intaad magiciisa ugu yeedhid.

Aayadda. 13 Tani waxa ay la mid tahay II Yooxanaa 12.

NASB (UPDATED) TEXT: 14b

^{14b}Nabadu ha kula jirto. Saaxiibbadii way ku soo salaamayaan. Saaxiibbada igu salaam mid kasta intaad magiciisa ugu yeedhid

Aayadda. 14 “Nabadu ha kula jirto” Tani waxa ay sida cad tixraacaysa afka Cibraaniga sarbeebtiisa sida ereyga *shalom* (cf. Luukos 10:5). Waxa ay noqon kartaa “ma nabad baa” ama “nabad gal.” Qeexi mayso oo keliya maqnaashada dhibaatooyinka laakiin xaadirmimada barakooyinka Ilaah. Kuwani waxa ay ahaayeen ereyadii ugu horreeyay ee Masiixa markii uu soo sara kacay ee uu xerta la joogay qolka sare (cf. Yooxanaa 20:19, 21, 26). Labadaba Bawlos (cf. Efesos 6:23) iyo Butros (cf. I Butros 5:14) waxay u isticmaalaan in ay tukashada dadka Ilaah xiritaan u tahay.

▣ “**magiciisa**” waa hadal sarbeebed ku aaddan, qof ahaanta, shaqsi ahaanta, iyo diirranaanta. Waxaa in badan lagu isticmaalay xaanshiyaha Masaarida.

SU’AALO FALANQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeena kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

4. Waxaa jiray aragtiyo badan oo ah sida ay Gayos iyo Diyotrefees ay isugu ekaadeed. Soojeedinnada qaar waxa ay ahaayeen:
 - a. Sababo fiqi ahaaneed
 - b. Sababo bulsho
 - c. Sababo wacdi ahaaneed
 - d. Sababo niyad ahaaneedSharrax ka bixi masuuliyadahan mid kasta iyo sida ay ula xidhiidhaan III Yooxanaa.
5. Sidee ayey II Yooxanaa iyo III Yooxanaa isugu xidhan yihiin?
6. Tax u same saddex tijaabada hubsashada Masiixiga ah oo laga heli karo I Yooxanaa sidoo kalena lagu sheegay II Yooxanaa iyo III Yooxanaa.

LIFAAQA KOWAAD

QEEXITAANKA KOOBAN EE NAXWAHA ERAYADA GIRIIGGA

Luqadda Giriigga ee Koine waxa xitaa lagu magacaabi jiray Hellenistic, waxaanay ahayd luqadda ay ku hadli jireen dadkii ku noolaa Medhetareeniyanka ilaa lagasoo bilaabo furashadii Aleksandarkii Waynaa (336-323 C.H) iyo ilaa laga soo gaadho sideedii boqol ee sanadood ee ka dambaysay (300 C.D-500 C.D). may ahayn oo keliya luqadda Giriigta assalka ah, laakiin siyaabo badan ayay u noqotay qaab cusub oo ah luqada Giriigta, waxaanay noqotay luqada labaa ee dadkii wakhtiyadii hore ku noolaa bariga Medhetareeniyanka.

Luqadda Giriigga ah ee Axdiga Cusubi waxay ahayd mid gooni ah siyaabo badan marka loo eego, maxaa yeelay kuwii adeegsan jiray marka laga reebo Luukos iyo qoraaga Cibraaniyada, oo iyagu adeegsaday luqadda Aramaatiga. Haddaba, qoraalkooda waxa saameeyay erayada iyo qaababka luqada Aremaatiga. Waxa kaloo ay akhriyeen waxna kasoo xigteen Septuagint tarjumaaddiisa Axdiga Hore, oo sidoo kalena ku qoraan luqada Koine ee Giriigta. Laakiin waxa iyana sidoo kale jirtay in Septuagint ay qoreen culimadii Yuhuudda ahaa oo luqadooda hooyo aanay ahayn Giriig.

Tani waxay haddaba ina xasuusinaysaa in Axdiga Cusub aynaan qaab naxwe ahaaneed isugu dhejin karin. Waa mid gaara waxaanay waxyaabo badan ka wadaagaan (1) Septuagint ga; (2) qoraallada Yuhuudda sida s kuwo Josephus; iyo (3) papyri yada laga helay Masar. Sideen haddaba u samayn karnaa qaabka naxwe ahaaneed ee Axdiga Cusub?

Qaabka naxwe ahaaneed ee luqada Giriigga ee Koine iyo koine ka Giriigga ee Axdiga Cusubi waa kuwo aad u faro badan. Siyaabo badan waxay u ahayd wakhti uu jiray fududaynta naxwuhu, waxaana marwalba ina hagaya qoraalka. Waayo erayadu waxay macno ku sameeyaan qoraalka badan, sidaasi darteedna qaabka naxwe ahaaneed waxa lagu fahmi karaa oo keliya (1) qaabka gaar ahaaneed ee qoraagu wax u qoro; iyo (2) qoraalka gaarka ah. Ma jiro haddaba qeexitaan suurto gala isla markaasna lagu qanci karo oo ah qaab dhismeed Giriig ah.

Luqada Koine ka ee Giriigta waxay ahayd luqad lagu hadlo, sidaasi darteedna marwalba furaha fasiraaddu waxay ku dhisantahay nooca iyo qaabka hadalka. Badanaa jumladaha gaabanna falka ayaa xagga hore imanaya isagoo tusinaya muhiimadda. Marka haddaba la furfuro falka Giriigga ah waxa jira saddex waxyaalood oo uu gudbinayo: (1) waxyaalaha xoogga ay saarayso dhacdadu, codka iyo xaaladda lagu jiro (shil amaba tusaale); (2) macnaha asal ahaaneed fal gaar ah; iyo (3) raacitaanka qoraalka.

I. DHACDO

A. Dhacdadu waxay koobsanaysaa xidhiidhka falka ee dhammayska tiran amaba aan dhammayska tirnayn. Waxaana lagu magacaabaa “hagaagsan” iyo “midaan hagaagsanayn.”

1. Dhacdada hagaagsani waxay diiradda saartaa saxsanaanta falka. Mana jirto faahfaahin dheeraada oo la bixinayo marka laga tago sheegitaanka inay wax dhaceen oo keliya. Lamana sheego meesha ay ka bilaabanto, sii socodkeeda iyo halka uugu sarraysa.
2. Dhacdada aan hagaagsanayni waxay diiradda saartaa sii socoshada falka, waxaana lagu tilmaami karaa fal toosan, fal muddo ama wakhti ah, fal soconaya, iwm.

B. Dhacdooyinka waxa lagu kala saari karaa sida qoraagu u arko falka isaga oo soconaya

1. Siday u dhacayso = AORIST
2. Dhacitaankeeda iyo natiijada la socota oo daa’ima = PERFECT
3. Waxay ahayd markii hore mid dhacaysa natiijo daa’imana leh, laakiin hadda waa = PLUPERFECT
4. Way dhacaysaa = PRESENT
5. Way dhici doontaa = IMPERFECT
6. Way dhici doontaa = FUTURE

Tusaalaha runta ah ee caawin kara tarjumaadda dhacdadu wuxuu noqon karaa erayga “badbaadin.” Waxaana loo adeegsaday dhacdooyin badan oo kala duwan iyadoo la toosinayo siday u dhacayso iyo heerka ay marayso:

1. AORIST “badbaaday” (Rooma 8:24)

2. PERFECT “la badbaadiyay iyadoo natiijaduna socoto”(Efesos 2:5, 8)
3. PRESENT “badbaadaya” (1 Korintos 1:18; 15:2)
4. FUTURE “badbaadi doona”(Rooma 5:9, 10; 10:9)

C. Marka aan eegno falalka dhacdooyinka, fasariyaashu waxay eegaan sababta asal ahaan qoraagu naftiisa uugu sheegayo dhacdo gaara. Heerka “sharraxaad la’aantu” dhacdadu wuxuu ahaa AORIST. Waxaana weeyi “aan khaas ahayn,” qaabka caadiga ah ee falka. Waxaana loo adeegsan karaa siyaabo kala duwan oo qoraalka aayaddu uu sheegi karo, oo asal ahaanna waxay ka hadlaysaa sida wax u dhacayaan. Xagga dhacdada tagtay wakhti hore waxa macneheedu yahay wax tegay oo la xallin rabo. Haddii markaas dhacdo kale la adeegsano waxa jira waxyaabo intaas ka badan oo xoogga la saarayo. Laakiin muxuu yahay?

1. PERFECT TENSE. Wuxuu ka hadlayaa fal la dhammays tiray oo natiijo daa’im ahna leh. Mararka qaar waxay isugu jiri kartaa AORIST iyo PRESENT TENSES. Hadiyo goor haddaba waxa ujeedadu tahay in falku dhammays tirmay natiijona ka imanayso. Tusaale ahaan Efesos 2:5 iyo 8, “waa la idin badbaadiyay oo badbaadana waxaanad ahaan doontaan kuwo lasii badbaadiyo.”
2. PLUPERFECT TENSE. Wuxuu ahaa sida wax hagaagsan marka laga reebo natiijada oo istaagtay. Tusaale ahaan “Butrus wuxuu taagnaa albaabka dibadda”(Yooxanaa 18:16).
3. PRESENT TENSE. Wuxuu ka hadlayaa fal aan toosnayn amaba aan dhammays tirnayn. Ujeedaduna waa hadiyo goor dhacdada oo sii socota. Tusaale ahaan “Ku alla kii isaga ku sii jiraa, ma dembaabo,” “Ku alla kii Ilaah ka dhashay dembi ma falo” (1 Yooxanaa 3:6 iyo 9).
4. IMPERFECT TENSE. Dhacdadani xidhiidhka ay la leedahay PRESENT TENSE gu waxay la mid tahay xidhiidhka ka dhexeeya PERFECT iyo PLUPERFECT. Wuxuu ka hadlayaa IMPERFECT gu dhacdo aan dhammays tirnayn oo dhacaysay laakiin la joojiyay amaba bilowga fal tegay. Tusaale ahaan: “waxaa u soo baxay dadka Yerusaleem” (Matayos 3:5).
5. FUTURE TENSE. Wuxuu ka hadlayaa fal dhici doona wakhtiga mustaqbalka ah ee iman doona. Wuxuu ka hadlaa dhacdo badanaa suurto gal noqon karta, waxaanu hadiyo jeer tilmaamaa suurto galnimada dhacdadaas. Tusaale ahaan: “Waxa barakadaysan...oo waxay” (Matayos 5:4-9).

II. COD

- A. Codku wuxuu sheegaa xidhiidhka ka dhexeeya dhacitaanka falka iyo fal sameeyaha oo ah kan samaynaya falka.
- B. ACTIVE VOICE waa codka tooska ah ee la filayo iyadoo si xooggan aan loo sheegay in faluhu uu sameeyay falka.
- C. PASSIVE VOICE codka aan tooska ahayn macnihiisuna waa fal sameeyaha oo helaya fal isaga dibadda lagaga sameeyay. Falsameeyaha dibadda ah Giriigga Axdiiga Cusub waxa lagu sheegaa meeleeeyayaashan:
 1. Adeege shakhsi ahaaneed oo ah *hupo* lana socdo xaalad abuuruhu(Matayos 1:22; Falimaha Rasuullada 22:30).
 2. Adeege shakhsi ahaaneed oo ku dhexdhexaadinaaya *dia* lana socdo xaalad abuuruhu (Matayos 1:22).
 3. Adeege aan shakhsi ahaan ahayn oo ku imanaya *en* kuna yimid qalab.
 4. Mararka qaarna wuxuu ku yimaaddaa mid shakhsi ahaaneed iyo mid aan shakhsi ahaan ahayn oo ku yimaadda qalab.
- D. MIDDLE VOICE oo ah kan falka samayanaya iyo inuu si toosa ugu lug leeyahay samaynta falka. Waxaana hadiyo goor lagu magacaabaa codka dareen ahaaneed ee ku xidhan doonista shakhsiga. Qaab dhismeedkanina waxa uu dhinac ka xoogaynayaa weedhaha fal sameeyahaha, mana aha mid laga helo luqada Ingiriisida oo keliya, waxaanay suurta galnimo wayn ku leedahay macnaha iyo tarjumaadaha luqada Giriigga. Tusaale ahaan:
 1. REFLEXIVE waana falka tooska ah ee fal sameeyuhu naftiisa ku sameeyo. Tusaale ahaan: “isdeldelay.” (Matayos 27:5).
 2. INTENSIVE falsameeyaha ayaa falka laftiisa ka dhigaya inuu isu sameeyo. Tusaale ahaan: “Shaydaanka qudhiisu wuxuu isu ekaysiiyaa malaa’igta iftiinka” (2 Korintos 11:14).
 3. Reciprocal – wax is dhaafsigu labada fal sameeye. Tusaale ahaan: “waxay ka wada hadleen” (Matayos 26:4).

III. DAREEN

- A. Waxa jira afar dareen oo ka muuqda luqada Koine ga ee Giriigga. Waxaanay tilmaamayaan xidhiidhka ka dhexeeya falku la leeyahay xaqiiqada ugu yaraan marka la eego waxa qoraaga ujeedadiisu tahay ee maankiisa ku jira. Dareennada haddaba waxa loo qaybiya labo qaybood oo waawayn: waana inuu tilmaamayo xaqiiqada (INDICATIVE) iyo inuu tilmaamayo suurto galnimada (SUBJUNCTIVE, IMPERATIVE iyo OPTATIVE).
- B. INDICATIVE MOOD wuxuu ahaa dareen caadi ah oo sheegaya falka dhacay amaba dhacayay ugu yaraan marka la eego qoraaga maankiisa. Waxaanay ahayd dareen keliya oo lagu sheegay wakhti gaara laakiin tani waxay ahayd dheeraad.
- C. SUBJUNCTIVE MOOD ku wuxuu sheegayaa suurto galnimada falk mustaqbalka dhici doona. Waa waxaan weli dhicin laakiin jaanisyadiisu waxay u eegyihin inuu dhici doono. waxaanu waxyaabo badan la wadaagaa FUTURE INDICATIVE ka, laakiinse farqiga u dhexeeyaa waxa uu yahay iyada oo SUBJUNCTIVE ku uu sheegayo heer shaki ah, waana midda luqada Ingiriisiga lagu cabiro iyadoo la odhanayo “could,” “would” “may” amaba “might” (laga yaabee, waxa dhici karta,).
- D. OPTATIVE MOOD ka waxa lagu sheegaa dareen doonis ah amaba jeclaysi iyadoo aragti ahaanna suurto gal ahayd. Waxa lagu tilmaamaa inuu xaqiiqada uuga dhowyahay SUBJUNCTIVE ka, waxaana OPTATIVE ka lagu sheegaa suurto galnimada hoos joogta xaalado la hubo, sidoo kalena OPTATIVE ku wuxuu naadir ku yahay Axdiga Cusub dhexdiisa. Waxa haddaba adeegsaday Bawlos “yaanay noqon” (KJV “Ilaahbaa xarrimay”), shan iyo toban jeer (Rooma 3:4, 6, 31; 6:2, 15; 7:7, 13; 9:14; 11; 1 Korintos 6:15; Galatiya 2:17; 3:21; 6:14). Tusaalayaasha kalena waxa laga helayaa Tesaloniika 1:38. 20:16, Falimaha Rasuullada 8:20, iyo 1 Tesaloniika 3:11.
- E. IMPERATIVE MOOD waxa lagu xoojiyay amar ahaa suurto gal, laakiinse xoojintu waxay ahayd ujeeddada qofka hadlayay. Waxay sheegaysaa oo keliya suurto galnimada doonista shuruuda ku xidhanina waa doorashada qofka kale. Waxa si gaara IMPERATIVE ka loo adeegsaday tukashooyinka iyo codsiga qofka saddexaad. Amarradan waxa haddaba Axdiga Cusub waxa lagaga dhex heli karaa iyagoo ah dhacdooyinka PRESENT iyo AORIST.
- F. Naxwayaasha qaarkood ayaa ayaa ayaa falka tilmaamaya sida wax loo qabto waxay ku tilmaamayaan mid ka mida dareenka. Aad bay ugu dhex badanyihiin Axdiga Cusub ee Giriigga ah, hadiyo goorna waxa lagu tilmaamaa fal lagu hadlo. Waxa loo tarjumay isagoo isku xidhaya falka muhiimka ah ee ay la xidhiidha falka. Waxa jira haddaba farqi wayn oo u dhexeeya marka la tarjumayo falalka tilmaamaya sida wax loo qabtay, waxaana fiican in lagala tashado tarjumaadaha kala duwan ee Ingiriisida. Waxaana ku caawin kara *The Bible in Twenty Six Translations* oo uu qoray Baker.
- G. AORIST ACTIVE INDICATIVE wuxuu ahaa mid si caadi ah amaba “aan lataabanin” u diiwaan geliya dhacdooyinka. Dhacda kasta oo kale ha ahaato cod amaba fasiraad kale oo gaar ahee, muhiimaddeedu waxa weeyi qoraaga asalka ahi midda uu rabay inuu xidhiidhka ku sameeyo.

IV. Qofka aan Giriigga ahayn fikradaha waxbarashadan soo socota ayaa siin karta macluumaadka uu rabo.

- A. Friberg, Barbara iyo Timothy. *Analytical Greek New Testament*. Grand Rapids: Baker, 1988.
- B. Marshall, Alfred. *Interlinear Greek-English New Testament Greek*. Grand Rapids: Zondervan, 1976.
- C. Mounce, William D. *The Analytical Lexicon to the Greek New Testament*, Grand Rapids: Zondervan, 1993.
- D. Summers, Ray. *Essentials of New Testament Greek*. Nashville: Broadman, 1950.

- E. Luqada Koine ee Giriigta barashadeeda oo fogaan dirsi ah waxa ay diyaar ku tahay Moody Bible Institute ee Chicago, IL.

V. MAGACYADA

- A. Magacyada waxa lagu kala saaraa xaalado. Xaaladuhu waxay ahaayeen kuwa saamaynaya magaca tusinaya magaca la xidhiidha falka iyo qaybaha kale ee weedha. Marka aan eegno luqada Koine ee Giriigga kuwo badan oo xaaladdan ahi waxay ku shaqaynayaan oo lagu tilmaamay meeleyayaal. Maadaama oo xaaladdani ahayd mid awood u leh in lagu magacaabo xidhiidho badan ayaa meeleyaya waxa laga dhigay inuu siiyo inuu kala saaro siyaabaha caqli galka ah ee ay u shaqaynayaan.
- B. Xaaladaha Giriigga waxa loo kala saaraa sideed siyaabood:
1. NOMINATIVE CASE waxa loo adeegsaday magacaabista waxaanu hadiyo goor ahaa falaha weedha. Waxa sidoo kale loo adeegsaday PREDICATIVE NOUNS ka iyo ADJECTIVES ka amaba sifooyinka iyadoo lala xidhiidhanayo falalka “ahaanshaha” amaba “noqoshada.”
 2. GENITIVE CASE ka oo loo adeegsaday qeexitaanka iyo hadiyo goorba tayada erayga la xidhiidha. Waxay ka jawaabtay su’aasha, “Nooc?” waxa sidoo kale lagu sheegay adeegsiga meeleyaya luqada Ingiriisada ee “of.”
 3. ABLATIVE CASE waxa loo adeegsaday si la mida GENITIVE ka laakiin waxa loo adeegsaday qeexitaanka lagu sheegayo kala soocnaanta. Waxay hadiyo goorba tilmaanta ka soocnaanta meel ee wakhti dhexdiisa, banaan, asal amaba darajo.
 4. DATIVE CASE waxa loo adeegsaday qeexitaanka danaha shakhsi ahaaneed, waxaanay tilmaami kartaa oggolaansho amaba diidmo. Waxa hadiyo goorba luqadah Ingiriisada lagu tilmaamay meeleyaya “to.”
 5. LOCATIVE CASE waxay la mid tahay sida DATIVE ka, laakiin wuxuu tilmaamayaa meel , wakhti amaba waxyaalaha caqli galka ah. waxaana hadiyo goorba lagu sheegaa meeleyaya Ingiriisida ah ee “in, on, at, amont, during, by, upon, iyo beside.”
 6. INSTRUMENTAL CASE waxay la mid tahay xaaladaha DATIVE ka iyo LOCATIVE ka. Waxaanu sheegay macnaha amaba urur. Waxaana lagu sheegaa meeleyaya Ingiriisida ah ee, “by” amaba “with.”
 7. ACCUSATIVE CASE waxa loo adeegsaday sheegitaanka gebogebada falka, waxaana lagu sheegay xaditaanka, oo adeegsigeeda ugu muhiimsanina wuxuu ahaa shay toos ah. wuxuu ka jawaabay su’aasha, “intee in leeg?”
 8. VOCATIVE CASE waxa loo adeegsaday hadal toos ah.

VI. ISKU XIDHAYAASHA IYO XIDHIIDHIYAYAASHA

- A. Luqada Giriigga waxay aad sax u ah maxaa yeelay waxay haystaa xidhiidhiyayaal badan. Waxay isku xidhaan fikirrada (erayada gaagaaban, weedhaha, iyo baaragaraafyada). Haddaba isku xidhayaashani waxay tusinayaan jihaynta fikirka qoraaga, waxaanay muhiim u yihiin qeexitaanka waxyaalaha uu isku dayay inuu ka hadlo.
- B. Halkan waxaan kusoo qaadan karnaa kuwo ka mida xidhiidhiyayaasha iyo isku xidhayaasha iyo macnohooda (waxaana lagasoo xigtay H. E. Dana iyo Julius K. Mantey buugooda *A Manual Grammar of the Greek New Testament*).
1. Xidhiidhiyayaasha wakhtiga
 - a) epei, epeid e, hpote, hos, hote, hotan (fal sameeyaha) – “goorma”
 - b) hoes – “kolkii”
 - c) hotan, epan (falsameeyaha.) – “markasta”
 - d) hoes, achri, mechri (falsameeyaha.) – “ilaa”
 - a. *priv* (dhamaad lahayn.) – “kahor”
 - b. *hos* – “ilaa,” “goorma” “sida”
 2. Xidhiidhiyayaasha caqli galka ah
 - a. Ujeedo
 1. *hina* (fal sameeye.), *hopos* (falsameeye.), *hos* – “si ay,” “kaa”

- (2) *hoste* (aan la xadidi karin) “kaa”
 (3) *pros* (aan la xadidi karin) ama *eis* (oon la xadidi karin) – “kaa”
- b. Natiijo (waxa jirta is kaashi u dhexeeya qaababka naxwe ahaaneed ee ujeeddo iyo natiijo)
 (1) *hoste* (dhammaad lahayn, kani waa ka uugu badan) – “si ay, ” “hadaba”
 (2) *hiva* (fal sameeye) – “inaad”
 (3) *ara* – “sidaa darteed”
- c. Sabab
 (1) *gar* (sabab/saamayn/ gebogebo) – “calashaan” “maxaa yeelay”
 (2) *dioti, hotiy* – “maxaa yeelay”
 (3) *epei, epeide, hos* – “ilaa”
 (4) *dia* (la socoto dacwayn) iyo (la socota dhammaad la’aan) – “maxaa yeelay”
- d. Fahmitaan
 (1) *ara, poinun, hoste* – “dabadeed”
 (2) *dio* (fahmitaanka ugu xooggan xidhiidhiyaha) “xaqiiqadii, ” “dabadeed”
 (3) *oun* “dabadeed, ” “sidaa daraadeed” “kadib” “waxa ka danbeeya”
 (4) *toinoun* – “marka loo eego”
- e. Farqiga
 (1) *alla* (farqiga xooggan) “laakiin” “laga reebo”
 (2) *de* – “laakiin, ” “si kastaba ha noqotee, ” “balse, ” “dhinaca kale”
 (3) *kai* – “laakiin”
 (4) *metoi, oun* – “si kastaba ha noqotee”
 (5) *plen* “si kastaba ha ahaatee, ” (waxay ku badantahay Luukos)
 (6) *oun* – “si kastaba ha noqotee”
- f. Isbarbar dhigga
 (1) *hos, kathos* (bilowga weedhaha is barbar yaal)
 (2) kata (*lakab ku ah, katho, kathoti, kathosper, kathaper*)
 (3) *hosos* (Cibraaniyada)
 (4) *e* – “ka”
- g. Xidhiidhsanaanta
 (1) *de* – “iyo, ” “imika”
 (2) *kai* – “iyo”
 (3) *tei* – “iyo”
 (4) *hina, oun* – “kaa”
 (5) *oun* – “kadib” (Yooxanaa)
3. Adeegsiga xoogaynta
 a. *alla* – “hubaashii, ” “haa, ” “xaqiiqdii”
 b. *ara* – “hubaal” “runtii”
 c. *gar* – “laakiin runtii, ” “hubaashii”
 d. *de* – “runtii”
 e. *ean* – “xitaa”
 f. *kai* – “xitaa, ” “runtii, ” “runtii”
 g. *mentoi* – “runtii”
 h. *oun* – “runtii, ” “xaqiiq ahaantii”

VII. WEEDHAHA SHURUUDU KU XIDHANTAHAY

- A. Weedhaha shuruuddu ku xidhantahay waxa weeyi kuwa ay la socoto in ka badan hal weedha oo gaaban isla markaasna shuruudi ku xidhan tahay. qaab dhismeedkan naxwe ahaaneedna wuxuu caawinayaa fasiraadda, isagoo bixinaya shuruudo amaba sababo ku salaysan, sababta falka muhiimka ahi uu saxda u yahay amaba u khaldan yahay, waxaana jira afar nooc oo ah weedhaha shuruuddu ku xidhan tahay.
- B. FIRST CLASS CONDITIONAL SENTENCE wuxuu yahay amaba ahaa fal u muuqda in qoraaga uu run sheegayo, isla markaasna uu rabo inuu ku sheego ujeedadiisa, sida “haddii.” Waxa kaloo jirta in

qoraallo kale loo tarjumay “ilaa” (Matayos 4:3; Rooma 8:31). Si kastabana ha noqotee sheegitaanka runta amaba beenta. Marar badan waxa loo adeegsaday tilmaamitaanka doodda amaba hadalka (Matayos 12:27).

- C. SECOND CLASS CONDITIONAL SENTENCE waxa badanaa lagu magacaabaa “soo jeedinta xaqiiqada.” Waxaanay sheegaysaa waxaan run ahayn oo raba inuu wax sameeyo. Tusaale ahaan:
1. “Ninkan hadduu nebi yahay, wuu ogaan lahaa naagtan taataabatay cid ay tahay iyo waxay tahay inay tahay dembiiley” (Luukos 7:39).
 2. “haddaad Muuse rumaysateen, anigana waad i rumaysan lahaydeen” (Yooxanaa 5:46).
 3. “Haddaan weli dadka ka sii farxinayo, ma aanan ahaadeen addoonkii Masiixa” (Galatiya 1:10).
- D. THIRD CLASS qofka saddexaad oo ka hadlayay falka mustaqbalka ah suurto galnimadiisa. Wuxuu hadiyo jeer ku saabsan yahay suurto galnimada falkas, waxaanu hadiyo goorba falkiisa muhiimka ahi ku yimaadaa weedha gaaban ee “ay.” Tusaale ahaan 1 Yooxanaa 1:6-10; 2:4, 6, 9, 15, 20, 21, 24, 29; 3:21; 4:20; 5:14, 16.
- E. FORTH CLASS waxa laga saaray suurto galnimada, waxaanu in badan ka dhex muuqdaa Axdiga Cusub. Xaqiiq ahaantii ma jiro weedhan inay labadeeda shuruudoodba noqon karaan kuwo la qeexi karo. Waxaan tusaale ahaan middan oo kale uugu soo qaadan karnaa weedha gaaban oo furitaanka u ah 1 Butros 3:14. Xagga gebogebaynta waxaan tusaale ahaan uugu soo qaadan karnaa Falimaha Rasuullada 8:31.

VIII. REEBISTA AMA MAMNUUCISTA

- A. PRESTN IMPERATIVE ka uu la socdo MEPATKCLE wuxuu hadiyo jeer xoojinayaa joojinta fal hore u socday ilaa haddadna shaqaynaya. Waxa ka mida tusaalayaasha: “Maal ha ku urursanina dhulka...” (Matayos 6:19); “Ha ugu welwelina naftiinna...” (Matayos 6:25); “Xubnihiinnana dembiga ha u siinina...” (Rooma 6:13); “Ha calool xumaynina Ruuxa Qoduska ah oo Ilaah...” (Efesos 4:30); iyo “Ha ku sakhraamina khamriga rabshadu ku jirto...” (5:18).
- B. AORIST SUBJUNVTIVE uula socdo MEPARTICLE wuxuu xoojinayaa “ha bilaabin falkaas.” Tusaale ahaan: “Ha u malaynina inaan...” (Matayos 5:17); “ha ku welwelina,” (Matayos 6:31); “ha ka xishoon..” (2 Timoteyos 1:8).
- C. DOUBLE NEGATIVE ka uu la socdo SUBJUNCTIVE MOOD waxa weeyi wada hadal xooggan. “weligiis waxaasi kuma dhici doonaan.” Tusaale ahaan: “weligiis dhimasho ma arki doono” (Yooxanaa 8:51); “..hibil weligay ma cuni doono” (1 Korintos 8:13).

IX. SHAQALKA

- A. Marka la eego luqada Koine ee Giriigga DEFINITE ARTICLE ka “the” wuxuu la midyahay kan Ingiriisida, waxaanu ahaa tilmaamaha dareenka siinaya magaca amaba cibaaro. Haddaba, adeegsigeedu wuu ku kala duwan yahay qoroyaasha Axdiga Cusub, waxaanu sidoo kale DEFINITE ARTICLE ku ku shaqayn karaa
1. Isaga oo wax kala saaraya sida magac u yaalka oo kale;
 2. Isaga oo ah calaamad tilmaamaysa falsameeyaha amaba qof hore loo soo tilmaamay;
 3. Isaga oo magacaabaya fal sameeyaha weedha ku dhex jira markaasna la xidhiidhaya falka. Tusaale ahaan: “Ilaah waa Ruux” Yooxanaa 4:24; “Ilaah waa iftiin,” 1 Yooxanaa 1:5; “Ilaah waa jacayl,” 4:8, 16.
- B. Luqada Koine ee Giriigtu ma laha INDEFINITE ARTICLE ka Ingiriisida ah ee “a” amaba “an.” Waxaanu taas macneheedu noqon karaa:
1. Diirad saarista qaabka amaba tayada uu wax leeyahay
 2. Diirad saarista nooca uu shay leeyahay.

- C. Qorayaasha Axdiga Cusubi waxay si waynu ugu kala duwan yihiin sida loo adeegsado ARTICLE ka amaba Shaqalka.

X. SIYAABAHA ADKAYNTA AMABA XOOJINTA EE AXDIGA CUSUB EE GIRIIGGA AH.

- A. Qaabka amaba siyaabaha muujinaysa adkaynta amaba xoojintu wuxuu yahay mid ay ku kala duwan yihiin qorayaasha Axdiga Cusubi. Kuwa markaas ugu badan ee sida joogtada ah aanay adkayntoodu isu bedelaynin waxay ahaayeen Luukos iyo qoraaga Cibraaniyada.

- B. Waxaan hore usoo sheegnay in AOURIST ACTIVE INDICATIVE ku inuu ahaa heer laguna tirinin xoojinta, laakiin dhacdooyinka kale oo dhan sida codka amaba dareenka wuxuu ku leeyahay muhiimad xagga fasiraadda ah. haddaba, tani kama tarjumayso AORIST ACTIVE INDICATIVE ka oon marwalba lahayn muhiimad xagga naxwaha ah. tusaale ahaan: Rooma 6:10 (labo jeer).

C. Habaynta erayada luqada Koine ee Giriigga

1. Luqada Koine ee Giriigtu waxay ahayd luqad aan sida Ingiriisida oo kale ku tiirsanayn habaynta erayada, sidaasi darteedna, qoraagu wuxuu ka leexan karaa caadi ahaan habayntii laga rajaynayay inuu muujiyo
 - a. Wixii qoraagu uu rabay inuu u sheego akhristaha
 - b. Wixii qoraagu ku fikirayay wuxuu ka yaabin karaa akhristaha
 - c. Wixii qoraaga si qoto dheer u dareensanaa wuxuu ku saabsanaa

2. Habaynta caadi ahaaneed ee luqada Giriigtu ilaa hadda waxay tahay midaan sugnayn. Haddaba, habeynta caadi ahaaneed laga hadlayaa waxay tahay:

- a. Falalka isku xidhistooda

- (1) FAL
- (2) FAL SAMEEYE
- (3) DHAMMAYS TIR

- b. Falalka hakashada ku jira

- (1) FAL
- (2) FAL SAMEEYE
- (3) MAFCUULKA
- (4) MAFCUULKA AAN TOOSKA AHAYN
- (5) MEELEEYAYAASHA

- c. Cibraarooyinka magacyada

- (1) MAGAC
- (2) DIB U HABEEYAHA
- (3) , MEELEEYAYAASHA

3. Habaynta erayadu waxay noqon kartaa mid noqon karta muhiim. Tusaale ahaan:

- a. “na siiyeen gacanta midigta oo wehelnimada” (Galatiya 2:9). Cibaarada “midigta wehelnimada” way kala qaybsan tahay iyadoo soo horraysiisay tusidda muhiimaddeeda.
- b. “la jira Masiixa” (Galatiya 2:20), ayaa lasoo horraysiiyay. Dhimashadiisana waxa la geliyay dhexda.
- c. “siyaalo badan oo kala duduwan” (Cibraaniyada 1:1), waa la horraysiiyay. Waxaanay ahayd sida Ilaah sida Ilaah naftiisa u muujiyay oo kala duwanayd, laakiinse maaha xaqiiqada waxyiga.

D. Caadi ahaan darajooyin adkaynta ah ayaa lagu muujiyay

1. Adkaynta magac u yaalka kaasoo hore uga mid ahaa falka. Tusaale ahaan: “oo bal eega had iyo goor ayaan idinla jooga..” (Matayos 28:20).
2. Maqnaanshaha xidhiidhiyaha la filayay ee erayada amaba weedhuha, waxa lagu magacaabay asyndeton (“aan boodayn”). Waxa la filayay xidhiidhiyaha, sidaasi darteedna maqnaansheheedu dareenka ayuu soo jeedinayaa. Tusaale ahaan:

- a. Fikirrada wanaagsan, ee Matayos 5:3 (adkaynta waxyaalahaas)
 - b. Yooxanaa 14:1 (mawduuc cusub)
 - c. Rooma 9:1 (qayb cusub)
 - d. 2 Korintos 12:20 (adkaynta waxyaalahaas)
3. Adkaynta erayada amaba cibaarooyinka ku dhex jira qoraalka gaaban ee aayadaha. Tusaale ahaan: “ammaanitaanka cisadiisa”(Efesos 1:6, 12 iyo 14). Waxaana ereyadan loo adeegsaday sheegitaanka shaqada uu leeyahay ruux wal oo ka mida Saddexmidnimadu.
 4. Adeegsiga erayga amaba cibaarooyinka codkoodu muuqanayo
 - a. euphemisms – beddelka erayada ku saabsan xarrimaadaha sida “seexashada” dhimashada (Yooxanaa 11:11-14) amaba “cago” sida ka muuqata (Ruud 3:7-8; 1 Samuu’eel 24:3).
 - b. circumlocutions – beddelka erayada loo adeegsado magaca Ilaah, sida “Boqortooyada janada” (Matayos 3:21) amaba “cod samada ka yimid” (Matayos 3:17).
 - c. Xaqiiqanimada hadalka
 - (1) Buunbuuninta aan suurto galka ahayn (Matayos 3:9; 5:29-30; 19:24).
 - (2) Dabacsanaanta odhaahyada (Matayos 3:5; Falimaha Rasuullada 2:36).
 - (3) Waxyaabaha la xidhiidha shakhsiyaadka (1 Korintos 15:55).
 - (4) Jeesjeeska (Galatiya 5:12)
 - (5) Qoraallada gabayga ah (Filiboy 2:6-11)
 - (6) Codka ka dhex muuqda erayada
 - (a) “kaniisad”
 - (i) “kaniisad” (Efesos 3:21)
 - (ii) “yeedhitaan” (Efesos 4:1, 4)
 - (iii) “yeedhay” (Efesos 4:1, 4)
 - (b) “xor”
 - (i) “naag xor ah” (Galatiya 4:31)
 - (ii) “xornimo” (Galatiya 5:1)
 - (iii) “xor” (Galatiya 5:1)
 - d. Erada luqada – luqada oo badanaa ah dhaqan iyo luqada gaarka ah:
 - (1) Waxay ahayd adeegsiga tusaale ahaaneed ee “cunto” (Yooxanaa 4:31-34).
 - (2) Wuxuu ahaa adeegsiga tusaale ahaaneed ee “Macbad” (Yooxanaa 2:19; Matayos 26:61).
 - (3) Wuxuu ahaa erayada Cibraaniga ah ee naxariista, “nacayb” (Bilowgii 29:31; Sharciga Kunoqoshadiisa 21:15; Tesaloniika 14:36; Yooxanaa 12:25; Rooma 9:13).
 - (4) “Dhammaan” iyo “badan.” Is barbar dhig Ishacyaah 53:6 (“dhammaan”) iyo 53:11 iyo 12 (“badan”). Erayadani waxay yihiin synonymous sida Rooma 5:18 iyo 19.
 5. Adeegsiga erayo buuxa halkii laga adeegsan lahaa mid keliya. Tusaale ahaan: “Sayid Ciise Masiix.”
 6. Adeegsiga gaarka ah ee *autos*
 - a. Marka uu la socdo shaqalka waxa loo tarjumay “la mida.”
 - b. Marka aanu la soconin shaqalku waxa loo tarjumay sida magac u yaalka INTENSIVE RFLXIVE PRONOUN ka –“laftiisa,” amaba “lafteeda.”
- E. Ardayda akhriinaysa Baybalka aan Giriigga ahayni waxay xoojinta ku ogaan karaan siyaabo kala duwan:
 1. Adeegsiga qoraallada faahfaahsan ee isugu jira Giriigga/Ingriisida.
 2. Isbarbar dhigista tarjumaadaha kala duwan ee Ingriisida. Tusaale ahaan: (KJVE, NKJV, ASV, NASB, RSV, NRSV) iyo kuwa kalee la midka ah (Williams, NIV, NEB, REB, JB, NJB, TEV). Waxa kaloo caawimaad laga fiican laga heli karaa *The Bible in Twenty-Six Translations* oo uu daabacay Baker.
 3. Adeegsiga *The Emphasized Bible* oo uu leeyahay Joseph Bryant Rotherham (Kregel, 1994).
 4. Adeegsiga tarjumaadaha kale ee badan
 - a. *The American Standard Version* ee 1901
 - b. *Young’s Literal Translation of the Bible* oo uu leeyahay Robert Young (Guardian Press, 1976).

Haddaba barashada naxwuhu way adagtahay laakiinse waxay lagama maarmaan u tahay fasiraadda haboon. Qeexitaanadan kooban amaba faallooyinkan iyo tusaalayaashan waxa loogu talo galay inay caawiyaan dadka aan Giriigga ahayn ee akhriinaya naxwaha uu koobsanayo Kitaabkani, hubaashiina waa la fududeeyay qeexitaannada.

Waxa loogu talo galay inaanay noqonin kuwo adag oon dabacsanayn, laakiinse inay noqdaan tallaabo wax ku oola oo fududaynasa fahmitaanka kitaabka Axdiga Cusub. Sidoo kale waxaan rajaynaynaa in qeexitaannadani ay akhristayaasha u fududayn doonaan faallooyinka amaba fasiraadaha ay mufasiriinta kale ka bixiyiin Axdiga Cusub.

Waa inaan awood u yeelano inaan fasiraaddeena ku salayno macluumaadka uu xanbaarsanyahay qoraalka Kitaabku, laakiinse naxwuhu isna waa mid aad ugu muhiima arrintan. Waxyaalaha kale waxay iyana noqon karaan dhinaca taariikhda, macnaha qoraalku xanbaarsanyahay ee xagga suugaan ahaaneed, adeegsiga erayga iyo aayadaha isku midka ah.

LIFAAQA LABAAD

CANBAARAYNTA QORAAL AHAANEED

Mawduucani wuxuu khuseeyaa sidii loo sharixi lahaa qoraalka ku dhex sugan tafsiirkan, waxaana la adeegsan doonaa guudmarkan:

- I. Ilaha qoraal ahaaneed ee Baybalka Ingiriisida ah
 - A. Axdiga Hore
 - B. Axdiga Cusub
- II. Sharrixitaanka kooban ee dhibaatooyinka iyo aragtiyaha “canbaaraynta qoraal ahaaneed.”
- III. Meelaha loogu noqon karo akhriska dheeraadka ah
- I. Ilaha qoraal ahaaneed ee Baybalka Ingiriisida ah
 - A. Axdiga Hore
 1. Masoretic Text (MT) – Qoraalka Cibraaniga ah waxa dejiyay Rabbi Aquiba markii taariikhdu ahayd 100 C.D. Dhibcaha shaqallada, lahjadda, xarakada iyo waxyaalaha la midka ah waxa lagu daray qarnigii lixaad ee C.D. waxaana la dhammeeyay qanigii sagaalaad ee C.D. waxaana sameeyay culimada Yuhuudda ee loo yaqaanay Masoretas. Haddaba, qaabka qoraal ahaaneed ee ay adeegsadeeni wuxuu la mid ahaa ka Mishnah, Talmid, Targums, Peshitta, iyo Vulgate.
 2. Septuagint (LXX) – Dhaqan ahaan waxa la yidhaahdaa Septuagint ga waxa soo saaray culimmo Yuhuuda oo tiradoodu dhammayd 70 iyagoo kuna dhammays tiray 70 cisho, waxaanay u soo saareen maktabadda Aleksandariya iyada oo uu maal gelinayo Boqor Blotemigii labaad (285-246 C.H). Waxa haddaba tarjumaadda codsaday oo soo jeediyay hogaamiye Yuhuudi ahaa oo ku noolaa Aleksandariya, waxaana odhaahdan dhaqan ahaaneed sheegaysa “Letter of Aristeas.” Haddaba, LXX ka waxa lagu saleeyay qoraal dhaqan ahaaneed oo Cibraani ah isla markaasna ka duwan qoraalka Rabbi Aquiba (MT).
 3. Dead Sea Scrolls (DSS) – waxa lagu dhex qoray Roomaanka Masiixa hortiis (200 C.H ilaa 70 C.H) waxaana qoray qolo Yuhuuda oo la odhan jiray “Essenes.” Haddaba, qoraallada Cibraaniga ah waxa laga helay agagaarka Badda Dhimatay, waxaanay mujiinayaan xoogaa inay ka duwanaayeen qoraallada MT iyo LXX ka.
 4. Waxa jira tusaalayaal muhiima oo ku saabsan is barbardhiga qoraalladani siduu mufasiriinta uuga caawiyay fahanka Axdiga Hore.
 - a. LXX ku wuxuu culimada mufasiriinta ah iyo tarjumayaasha ka caawiyay fahanka MT
 - (1) LXX ka Ishacyaah 52:14, “sidii kuwa badanu ula yaabi jireen oo kale.”
 - (2) MT ga Ishacyaah 52:14, “sida kuwo badani kuula yaabeen.”
 - (3) Ishacyaah 52:15 dhexdeeda magac uyaalka LXX ka waxa laga dhigay
 - (a) LXX, “sida quruumo badani uuga yaabi doonaan isaga”
 - (b) MT, “wuxuu yaab gelin doonaa quruumo badan.”
 - b. DSS ku wuxuu tarjumayaasha iyo culimada ka caawiyay fahanka MT
 - (1) DSS ka Ishacyaah 21:8, “wuu qayliyay oo wuxuu yidhi, waxaan jooga meeshayda waardiyaha..”
 - (2) MT ga Ishacyaah 21:8 “wuxuu u qayliyey sidii libaax oo kale oo yidhi, Sayidow, maalintii oo dhan waxaan had iyo goorba ku kor taagnahay munaaradda.”
 - c. LXX ka iyo DSS ka labadooduba waxay faahfaahiyeen Ishacyaah 53:11
 - (1) LXX iyo DSS, “markuu arko naftiisa wuxuu arki doo iftiin, waanu u riyaaqi doonaa”
 - (2) MT, “Wuxuu arki doonaa waxay naftiisu ku dhibtootay, wuuna u riyaaqi doonaa”
 - B. Axdiga Cusub
 1. In ka badan 5300 oo qoraal isla markaana ah gebi ahaanba qaybaha Axdiga Cusub ee Giriigga ayaa jira. Ku dhowaad 85 waxa lagu qoray waraaqo hore iyadoo 268 qoraal ay yihiin kuwo lagu qoray far waayayn (uncials). Intii ka dambaysay qarnigii sagaalaad C.D., waxa la sameeyay qoraallo badan, iyadoo qoraallada lagu qoray Giriigga ay ahaayeen ku dhowaad 2700. Waxa kaloo la hayaa 2, 100 nuqul ahna Qorniinka isla markaasna loo adeegsaday caabudaadda.
 2. Ku dhowaad 85 kamida qoraallada Giriigga oo koobsanaya qaybo ka mida Axdiga Cusub ayaa waxa lagu hayaa matxafyada. Kuwo ka mida qoraalladaasna waxay taariikhdoodu u noqonaysaa qarnigii

labaad ee Masiixa dabadiis, laakiinse badankooda waxay taariikhdoodu u noqonaysaa qarnigii afraad ee C.D. Haddaba, MSS ku ma koobsanayo Axdiga Cusub oo dhan, maxaa yeelay nuqulladan ugu da'doodu aadka u wayntahay ee Axdiga Cusub maaha macneheedu in loogala jeedo iyaga oo kala duwan. Kuwo badan oo ka mida waxa loo koobiyeeyay adeegisaga, sidaasi darteedna maadaama oo aan daryeelka dan laga gali jirin waxay ka koobsanayaa kala duwanaansho badan.

3. Codex Sinaiticus ka, waxa loo yaqaanay xarafka Cibraaniga ah ee a (*aleph*) amaba (01), Waxa laga helay St. Catherine ee Buur Siinay dusheeda, waxaana helay Tischendorf. Waxaanay taariikhdeedu u laabanaysaa qarnigii afraad ee C.D. waxaanay ka koobantahay LXX ka Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub ee Giriigga ah, waana nooca “Qoraalkii Aleksandariyiinta.”
4. Codex Alexandinus, waxa loo yaqaanaa “A” amaba (02), waana qoraaladii Giriigga ee ahaa qarnigii shanaad isla markaasna laga helay magaalada Aleksandariya ee waddanka Masar.
5. Codex Vaticanus, waxa loo yaqaanaa “B” amaba (03), waxaana laga helay maktabadda Faatikaanka ee Rooma, taariikhdeeduna wuxuu u laabanayaa badhtamihii qarnigii afraad C.D. Waxaanay koobsanaysaa LXX ka Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub ee Giriigga ah. iyana sidoo kale waxay la mid tahay “Qoraalkii Aleksandariyaanka ”
6. Codex Ephraemi, waxa loo yaqaanaa “C” amaba (04), waana qoraaladii Giriigga ee qarnigii shanaad ee badh ahaantooda la baabiiyay.
7. Codex Bezae, waxa loo yaqaanaa “D” amaba (05), waana qoraaladii Giriigga ee qarnigii shanaad. Waxaana weeyi masuulka ugu sarreeya waxa lagu magacaabo “The Western Text” oo ah qoraallada reer galbeedka. Waxay koobsanaysaa waxyaalo badan oo lagu daray, waxaanay ahayd waxa ugu muhiimsan ee markhaatiga u ah tarjumaadda King James.
8. MSS ka Axdiga Cusub waxa loo kala saari karaa saddex qaybood amaba waxa suurto gala afar qaybood, oo wadaaga waxyaalo isku mida.
 - a. Qoraallada Aleksandariya ee Masar
 - (1) P⁷⁵, P⁶⁶, (ku dhowaad 200 C.D), waxaana lagu diiwaan geliyay Injiillada.
 - (2) P⁴⁶ (ku dhowaad 225 C.D), waxaana ku diiwaan gashan waraaqihii Bawlos.
 - (3) P⁷² (ku dhowaad 225-250 C.D), waxaana ku diiwaan gashan Butros iyo Yuudas
 - (4) Codex B, oo lagu magacaabo Vaticanus (ku dhowaad 325), waxaanu koobsanayaa Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub oo dhammays tiran.
 - (5) Xigashooyinka Origen ee nooca qoraalladan
 - (6) MSS ka kale ee tusinaya qoraallada noocan ahi waa a, C, L, W, 33.
 - b. Qoraallada galbeedka ee Waqooyiga Afrika
 - (1) Waxyaalahii lagasoo xigtay wadaadadii kaniisadda Waqooyiga Afrika sida, Tertullian, Cyprian, iyo tarjumaadihii Laatiinka ee Hore.
 - (2) Waxyaalihii lagasoo xigtay Irenaeus
 - (3) Waxyaalaha laga soo xigtay Tatian iyo tarjumaadaha Old Syriac.
 - (4) Codex D “Bezae” ee raaca qoraalka noocan ah
 - c. Qoraallada bariga Byzantine ee Constantinople
 - (1) Qoraalkani noocan ahi boqolkiiba 80 wuxuu ka muuqanayaa 5300 ee MSS ka.
 - (2) Waxa lagasoo xigtay wadaadadii kaniisadii Antiokh ee Siiriya, Cappadoceans, Chrysostom, iyo Therodoret
 - (3) Codex A, ee Injiilada oo keliya
 - (4) Codex E, (qarnigii sideedaad) ee Axdiga Cusub oo dhammays tiran.
 - d. Nooca afraad ee suurta galka ahina waa “Caesarean” ee Falastiin
 - (1) Waxa laga dhex arki karaa Markos
 - (2) Markhaatiyada qaarkood ayaa sheegaya inay yihiin P⁴⁵ iyo W.

II. Dhibaatooyinka iyo aragtiyaha “canbaaraynta qoraal ahaaneed.”

A. Sida kala duwanaanshuhu usoo arooray

1. Kedis ahaan

a. Ilduufka ku imanaya qoraalka gacanta ee laga yaabo inuu keeno khaladka erayada (homoioteleuton).

(1) Ilduufka amaba khaladka ku iman kara laban laabista xarafka amaba erayga (haplography).

(2) Kama’ a amaba ilduufka xagga maanka ah iyadoo lagusoo celiyo erayo amaba sadar amaba iyadoo si khaldan loo qoro (dittography)

- b. Ilduufka amaba khaladka ka iman kara yeedhiska (itacism). Hadiyo goorna khaladka xagga qoraalku wuxuu keeni karaa erayo codkoodu isku mid noqon karo luqada Giriigga.
 - c. Qoraalladii hore ee Giriiggu maha laha cutubyo iyo qaybinta aayadaha, sidoo kalena xarakada iyo meelaha bannaan ee u dhexeeya erayadu way yaraayeen ama mabay jirin.
2. Badheedhka
- a. Bedelitaanka waxa loo sameeyay si loo hagaajiyo qaab dhismeedka naxwe ahaaneed
 - b. Bedelitaanka waxa loo sameeyay si ay u waafaqaan aayadaha kale ee Kitaabka ka midka ah isla markaasna ay isku midka yihiin.
 - c. Bedelitaanka waxa loo sameeyay iyadoo la isku xidhayo labo ama akhrisyo kaloo ka badan
 - d. Bedelitaanka waxa loo sameeyay iyadoo la isku dayayo saxitaanka dhibaato ka muuqan karta qoraalka (1 Korintos 11:27 iyo 1 Yooxanaa 5:7-8)
 - e. Faahfaahin dheeraada sida hagaajinta taariikhda amaba fasirka haboon ee qoraalka ayuu sheekh kala xadeeyay, laakiin waxa dhici karta in sheekh kale uu isku dhex daray (Yooxanaa 5:4).
- B. Aragtida asaasiga u ah canbaaraynta qoraal ahaaneed (waxyaabaha caqli galka ah marka la akhrinayo qoraalka asalka ah hadii uu jiro is khilaaf)
- 1. Waxyaalaha ugu sirgaxan amaba qoraalka naxwe ahaan aan caadiga ahayni waa qoraalka asalka ah
 - 2. Qoraalka ugu gaabani waa ka asalka ah
 - 3. Qoraalka wayn waxa la siiyay culays badan sababtuna waa dhowaansheheeda taariikh ahaaneed ee asal ahaanta, wax waloo kalana isku mid bay ahaayeen
 - 4. MSS ka juquraafi ahaan kala duwani wuxuu leeyahay akhrinta asalka ah
 - 5. Caqiido ahaan qoraallada taagta yari, gaar ahaan kuwa la xidhiidha fiqiga ee is bedelaan, sida Saddexmidnimada 1 Yooxanaa 5:7-8 waana in la door bido.
 - 6. Qoraalka sida ugu fiican u sharrixi kara asalka kala duwanaanshaha
 - 7. Labo xigasho oo tusin kara isu dheellitirka dhibaatooyinkan kala duwanaanshaha
 - a. J. Harold Greenlee kitaabkiisa, *Introduction to New Testament Textual Criticism*, “Ma jirto caqiido Masiixi ah oo loo diidayo ka doodista qoraalka; ardayga Axdiga Cusubina waa inuu ka digtoonaado doonista ah inuu qoraalkiisu yahay asal kana xooggan yahay kii asal ahaan waxyiga ahaa” (p.68).
 - b. W. W. Criswell ayaa Greg Garrison ka *Birmingham News* u sheegay in isagu aanu rumaysnayn in eray kasta oo Kitaabka ka mid ahi aanu ahayn waxyi, “ugu yaraan maaha eray kasta oo wakhtigan casriga ah ay sameeyeen tarjumaannadu.” Criswell wuxuu yidhi: “Anigu aadbaan u rumaysanahay canbaaraynta qoraal ahaaneed. Sida aan u malaynayana, qaybta ugu danbaysa cutubka 16 ee Markos waa faasiqnimo mana aha waxyi, laakiinse waa la isku dardaray...marka aad barbar dhigto qoraallada kale ma jiro mid gebo gebadiisu tahay sida Kitaabka Markos oo kale, qof ayaana ku daray...”
- Sidoo kale duqa SBC ayaa isna sheegay in sidoo kale loo fiirsan karo dhacdada ku diiwaan gashan Yooxanaa 5 ee ah Ciise iyo wartii Beytesda. Iyo sidoo kale falaqaynta labada waxyaalood ee ku saabsan Yuudas oo is dilay (Matayos 27 iyo Falimaha Rasuullada 1): “Waa aragtiyo kala duwan oo is dilitaan ah.” ayuu yidhi Criswell. “Haddii ay ku jirto Kitaabka, waxa loo hayaa sharraxaad iyadoo labada meelood ee sheegaya is dilitaanka Yuudasna ay ku sugan yihiin Baybalka.” Waxa kaloo Criswell intaas uu raaciyay, “Canbaaraynta qoraal ahaaneed iyada lafteeda ayaa isu ah cilmi layaab badan. Mana aha wax kooban, mana aha edeb darro, laakiinse waa wax jira oo udub dhexaad ah...”

III. Dhibaatooyinka qoraallada

A. Meelaha amaba maraajicda loogu noqon karo akhris dheeraad ah:

- 1. *Biblical Criticism: Historical, Literary and Textual*, waxaana leh R. H. Harrison
- 2. *The Text of the New Testament: Its Transmission, Corruption and Restoratoin* oo uu leeyahay Bruce M. Metzger
- 3. *Introduction to New Testament Textual Criticism*, oo uu leeyahay J. H Greenlee

AAQA SADDEXAAD

MACNAHA ERAYADA CUSUB

Adoptionism. Waa aragtiyihii hore ee Ciise marka la eego xidhiidhka uu la leeyahay ilaahnimada. Waxay markaasi sheegaysaa in Ciise uu ahaa aadane caadi ah iyadoo si gaarana uu Ilaah xidhiidh uula yeeshay markii la baabtiisay (Matayos 3:17; Markos 1:11) amaba sarakicistiisii (Rooma 1:4). Ciise noloshiisu waxay ahayd mid tusaale u ah Ilaah, marka dhinac laga eegana baabtiisamkiisii iyo sarakiciddiisii waxay ka dhigeen Wiilka Ilaah (Rooma 1:4; Filiboy 2:9). Haddaba middani waxay ahayd aragtidii kaniisaddii hore iyo intii ka horraysay qarnigii siddeedaad. Halkii Ilaah ka noqon lahaa nin oo isu soo ekaysiin lahaa, ayaa waxay tilmaamaysaa in ninkii uu isagu noqoday Ilaah!

Way adagtahay sida loo sheego Ciise inuu yahay Ilaah Wiilka ah, iyo sida uu tusaale ugu ahaa noloshu Ilaah. Haddaba, hadii ugu horrayntiiba uu ahaa Ilaah, sidee marlabaad loogu abaal marin karaa amaba loogu shariixi karaa Ilaahnimo? Haddii ugu horrayntiiba jiray oo ahaa Ilaah sidee baa loo siin karaa tix gelin dheeraad ah? inkastoo ay adagtaha inaan innagu garano, haddana Aabbuhu wuxuu Ciise siiyay tix gelin gaara oo ku salaysan sida wanaagsan ee uu u fuliyay doonista Aabbaha.

Alexandrian School. Qaabkan ah fasiraadda Baybalku wuxuu ahaa mid lagu samayn jiray magaalada Aleksandariya ee waddanka Masar qarnigii labaad C.D. waxaanu adeegsanayaa nidaamka fasiraadda ee Philo oo ka mid ahaa xertii Plato, waxaana lagu magacaabi jiray qaacidada amaba nidaamka maldahan. Wuxuu saamayn ku lahaa kaniisadda ilaa lagasoo gaadho wakhtigii uu samaysmay Borotastanku asal ahaanteeduna waxay u noqonayaan Origen iyo Augustine. Eeg Moises Silva kitaabkiisa, *Has The Church Misread The Bible?* (Academic, 1987).

Alexandrinus. Qoraalkan Giriigga ah ee u noqonaya qarnigii shanaad kana socda Aleksandariya, wuxuu koobsanayaa Axdiga Hore, Apocrypha, iyo Axdiga Cusub. Waana markhaatiga ugu wayn ee gebi ahaanba Axdiga Cusub ee Giriigga ah (marka laga reebo qaybo ka mida Matayos, Yooxanaa, iyo 2 Korintos). Marka haddaba qoraalladan oo ah “A” iyo kuwa ah “B”(Vaticanus) ay isku waafaqaan akhrista, waxa culimada badankoodu kasoo qaadaan inay yihiin qoraallada tusaalaha u ah asalka.

Allegory. Waa nooc ka mida tafsiirrada Baybalka oo asal ahaanna waxa qoray Yuhuuddii Aleksandariya, waxaana caan ku ahaa Philo gii reer Aleksandariya. Asal ahaanna waxay xoojinayaan sidii Qorniinku ku noqon lahaa mid leh dhaqan iyo faylasofuyad isku mida iyadoo laga tegayo dhacdooyinka taariikh ahaaneed amaba dhacdooyinka suugaan ahaaneed. Waxa uu raadiyaa macno ruuxi ahaaneed oo ka danbeeya qoraalkasta oo ka mida Qorniinka. Waa waa in la ogsoonaado waxyaalaha Masiixu ku sheegay Matayos 13, iyo Bawlos ee Galatiya 4 waxaanay tusaale u tahay xaqiiqada.

Analytical lexicon. Kani waa nooc ah qalab baadhitaan oo suurto gelinaya sidii lagu garan lahaa eray kasta oo Giriiga isla markaasna ku sugan Axdiga Cusub dhexdiisa. Wuxuu koobsanayaa erayada Giriigga ah iyo qeexitaankooda, waxaanu markaas akhristyaasha xerta ah u suurto gelinayaa oo ka caawinayaa fahanka macnaha erayada Giriigga ah iyo naxwaha.

Analogy of Scripture. Tani waa cibaarada lagu cabiro laguna sheego in dhammaanba Kitaabku uu yahay waxyiga Ilaah, sidaasi darteedna malaha wax iska hor imaada laakiinse wuu isu dheelli tiran yahay. Aragtidani haddaba waa midda gun dhigga u ah adeegsiga aayadaha isku midka ah iyo fasiraaddooda.

Ambiguity. Waxay tilmaamaysaa hubitaan la'aanta ka imanaysa marka ay jiraan qoraallo leh labo macnayaal amaba ka badan oo suurto gal ah isla markaasna hal mar lawada sheegay. Waxa suurto gal ah Yooxanaa oo adeegsaday middan xanbaarsanaan karta labada waxyaalood ee suurto galka noqon kara.

Anthropomorphic. Macneheedu waxa weeyi “haysashada dabeecada amaba qaabka la xidhiidha aadanaha, ” waxaana loo adeegsaday sheegitaanka diinteenna ku saabsan Ilaah, asal ahaanna waxay ka timid erayga Giriigga ah ee tilmaamaya aadanaha, waxaana loogala jeedaa inaan Ilaah uga hadalno sidiiyoo uu nin yahay. Maxaa yeelay Ilaah waxa looga hadlaa jidh ahaan, nafsad ahaan iyo fikir ahaan intaba, waxaana loo

adeegsadaa erayo la xidhiidha aadanaha (Bilowgii 3:8; 1 Boqorradii 22:19-23). Si kastaba ha ahaatee, ma jiraan erayo kale oon ahayn kuwa aadanuhu isu adeegsan karo inaan adeegsano, sidaasi darteedna cilimiga amaba aqoonta aan Ilaah u leenahay waa mid kooban.

Antiochian School. Qaabkan fasis ahaaneed ee Baybalka waxa lagu horu mariyay Antiyokh, Siiriya qarnigii saddexaad C.H. waxaanu ka jawaab celinayay nidaamkii maldahnaa ee lagu adeegsan jiray magaalada Aleksandariya ee Masar. Haddaba, ujeedadiisa asaasiga ahaydi waxay ahayd in diiradda la saaro macnaha ay samaynaso taariikhda ku sugan Baybalku, waxaanu Baybalka u fasisrayaa si caadi ah. sidoo kale dugsigani wuxuu ka hadlay oo fara geliyay haddiiba Ciise Masiix uu leeyahay labo dabecadood (Nestorianism) amaba hal dabecad oo kaliya (Ilaah dhammays tiran iyo aadane dhammays tiran). Wuxuu dugsigani la xidhiidhay kaniisaddii Roomaanka iyo tii Aasiya laakiinse muhiimaddiisu way yarayd. Ugu dambayntiina wuxuu waddo u noqday fasiraadaha ku salaysan kitaabka ee ay raaceen Brotastanku (Luther iyo Calvin).

Antithetical. Waa mid ka mida saddex eray oo loo adeegsado macnaha xidhiidhka ka dhexeeya laynanka gabayada Cibraaniga. Waxay la xidhiidhaa layman gabay ah oo macnohoodu iska soo horjeedno (Maahmaahyadii 10:1, 15:1).

Apocalyptic literature. Wuxuu ahaa nooc gaar u ahaa Yuhuudda, waxaanu ahaa nooc ka mida qoraalka oo la adeegsaday wakhtiyadii Yuhuudda ay duullaanka ku ahaayeen awoodihii ajnebiga ahaa ee ku hareeraysnaa. Waxa ay u muuqataa inuu ku saabsanaa Ilaah oo maamula dhacdooyinka dunida oo dhan, iyo isaga oo si gaara dan uga leh Israa'iil isla markaasna ilaalinaya marwalba. Haddaba, qoraalladani waxay ballan qaadayeen in ay iman doonto guusha Ilaah een xadka lahayni.

Waxay markaasi wataa calaamooyin badan oo xitaa lagu muujiyay midabo, tirooyin, aragtiyo, riyoooyin, dhexdhexaadinta malaa'igta, erayo sir ah iyo waxyaalaha ku dhex jira khayrka iyo sharka. Tusaal ahaan waxaan usoo qaadan karnaa (1) Axdiga Hore dhexdiisa, Yexesqeel (cutubyada 36-48), Daanyeel (cutubyada 7-12), Sekaryaah; iyo (2) Axdiga Cusub dhexdiisa, Matayos 24; Markos 13; 2 Tesaloniika 2 iyo Muujintii.

Apologist (Apologetics). Waxay asal ahaan ka timid luqada Giriigga waxaana weeyi "is difaacitaan sharciyaysan." Waa xishmad gaara oo fiqiga dhexdiisa ah isla markaasna raadisaa caddayn iyo doodo dhex mari kara caqiidooyinka Masiixiyadda.

A priori. Waxay asal ahaan la xidhiidhaa "run u eegaysiinta." Waxay tahay sabab u yeelista waxyaalaha hore loo aqbalay qeexitaankooda amaba heerka ay ugu muuqan karaan runta, waana midda lagu aqbali karo itixaamis la'aan.

Arianism. Ariyas wuxuu kaniisad dhaqaaleeye ka ahaa kaniisaddii Aleksandariya qarnigii saddexaad iyo kii afraad. Wuxuu markaasi sheegay in Ciise uu hore u jiray laakiinse aanu aanu lahayn awoodda ilaahnimada, waxaana suurta gala inuu raacayay Maahmaahyadii 8:22-31. Wuxuu la dooday wadaadkii Aleksandariya, oo bilaabay (318 C.D) dood sanado badan socotay. Haddaba, Arianism ku wuxuu noqday caqiidada Kaniisadda Bariga. Guddiga Nicaena ayaa haddaba 325 C.H ayaa xukumay Arius waxaanay carrabka ku adkeeyeen tayada iyo ilaahnimada Wiilka.

Aristotle. Wuxuu ka mid ahaa faylasuufyadii Giriigii hore, waxaanu ahaa ardaygii Plato, sidoo kalena wuxuu ahaa macallinkii Aleksandarkii Waynaa. Haddaba, saamayntiisu xitaa maanta waxay gaadhsiisan tahay waxyaabo badan oo khuseeya daraasaadka casriga ah, maxaa yeelay wuxuu adkeeyay oo sheegay aqoonta lagu heli karo wax u fiirsashada iyo ablo ablaynta, waana aragtiyaha uu aaminsanyahay sayniska.

Autographs. Waa magaca loo bixiyay qoraaladii asalka ahaa ee Baybalka. Qoraaladii asalka ahaa ee gacmaha lagu qoray way lumeen, waxaana la hayaa koobiyadii oo keliya. Haddaba tani waa meelaha loogu laaban karo qoraallada kala duwan ee Giriigga iyo Cibraaniga isugu jira wakhtigooduna horreeyay.

Bezae. Waa qoraal ah Giriig iyo Laatiin isla markaana u noqonaya qarnigii lixaad C.D. waxaana loo soo gaabiya "D." waxaanu koobsanayaa Injiillada iyo Falimaha Rasuulda iyo sidoo kale kuwo ka mida Waraaqaha Guud

ahaan. Waxa ay koobsanaysaa waxyaalo badan oo dheeraad ah, waxaanu samaynayaa waxyaalaha gundhigga u ah qoraallada Giriigga ee ka danbeeyay King James Version.

Bias. Waa eray loo adeegsaday qeexitaanka xooggan ee wax lagu tilmaamayo amaba aragtida ah. waa fikirka dhexdhexaad ahaaneed ee ka madax bannaan suurto galnimo la'aanta shay amaba aragti.

Biblical Authority. Waxa loo adeegsaday dareen gaar ah. waxa lagu qeexay fahanka laga qaadan karo asal ahaan qoraaga wixii maalmihiisii la odhan jiray iyo sida loogu dabaqi karo wakhtigan aan joogno. Haddaba, awoodda amaba amarka uu leeyahay Baybalku ayaa wuxuu yahay midka inna hagi kara oo keliya. Si kastaba ha ahaatee, iftiinkan dartiis waxaan xaddiday qaabka ah in Baybalka lagu fasiro naxwe ahaanta iyo taariikh ahaanta.

Canon. Waxa loo adeegsadaa qeexitaanka qoraallada la rumaysan yahay inay yihiin waxyi gaara, waxaana loo adeegsaday Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub labadaba.

Christocentric. Waxa loo adeegsaday Ciise . waxaan u adeegsaday is ku xidhista fahanka ah in Ciise uu yahay Rabbiga dhammaanba Baybalka. Axdiga Hore isaga ayuu sii sheegay, oo isaguna wuu dhammays tiray wixii lagu sii sheegay iyo ujeeddadiiba (Matayos 5:17-48).

Commentary. Waxa weeyi kitaab gaara oo baadhitaan ah. wuxuu tusinayaa fikradda guud ahaaneed ee kitaabka Baybalka, kaddibna wuxuu sharraxayaa qayb kasta oo ka mida kitaabka. Qaar waxay diiradda saaraan ku dabiqaanka, halka kuwo kalena ay siyaabo kale uula tacaalaan qoraalka. Haddaba, kitaabadani waxbay caawinayaan laakiin waxa muhiima in la adeegsado marka qofku uu sameeyo baadhitaankiisa. Fasiraadda mufasiriinta waa inaan la aqbalin iyada oon ceeb loo raadinaynin. Haddaba, is barbar dhigista fasiraado badani waxay noqon kartaa mid caawimaad badan leh.

Concordance. Waa qalab baadhitaan oo loogu talo galay barashada Baybalka. Waxa ay diiwaan gelinaysaa saxsanaanta eray kasta oo kusoo arooray Axidiga Hore iyo Axdiga Cusub, siyaabo kala duwan ayaanay wax u caawinaysaa: (1) Qeexitaanka erayada Cibraaniga amaba Giriigga ee ka danbeeya eray kasta oo Ingiriisi ah; (2) is barbar dhigista qoraallada loo adeegsaday erayada isku midka ah ee Cibraaniga amaba Giriigga; (3) tusidda meesha laba eray oo Cibraani amaba Giriigga ahi ku kala duwanyihiin isla markaana iyagoo isku mida loogu adeegsaday Ingiriisida; (4) muujinta soo noqnoqoshada erayo lagu dhex hubo buugaag amaba qoraayaal; (5) ka caawinta sidii qof ku heli lahaa aayado ka mida Baybalka (Walter Clark kitaabkiisa *How to Use New Testament Greek Study Aids*, pp. 54-55).

Dead Sea Scrolls. Waxa weeyi qoraallo taxane ah oo ku qoran luqada Cibraaniga iyo Aramaatiga isla markaasna laga helay agagaarka Badda Dhimatay 1947. Waxay ahaayeen maktabadihii diinta ee Yuhuuddii qarnigii hore. Cadaadiskii Roomaanka iyo dagaalladii 60 kii ayaa ku sababay inay ku dhex qariyaan godadka iyo waxyaalaha la midka ah. haddaba, waxay innaga caawiyeen fahanka Falastiintii qarnigii hore iyagoo ansixiyayna saxnimada Masoretic Text ka, iyo sida ay ugu noqonayaan casrigii hore ee C.H. Waxa iyaga loo soo gaabsadaa “DSS.”

Deductive. Nidaamka ku dhisan caqli galka amaba sabab u yeelistu wuxuu ka imanayaa waxyaalaha sida gaarka ah loogu yeeli karo macnaha iyo sababta. Waxay kasoo hor jeeddaa sabab u yeelista saynisyahaddu ku dhaqmaan ee laga helo u fiirsashada si loo gaadho aragti kama danbays ah.

Dialectical. Waa nidaamka sababta u yeelaya waxyaalo iska hor imanaya iyada oo la raadinayo jawaabta midaynaysa ee koobsanaysa labada dhinacba. Caqiidooyin badan oo kitaabi ah ayaa waxay leeyihiin dhinacyo ay isku khilaafsanyihiin, karti – doonis ; ammaan – adkaysi; rumaysad – camal; go'aan – edbin; xornimada Masiixiga – masuuliyadda Masiixiga.

Diaspora. Waxay ahayd erayga Giriigga ah ee Yuhuuddii Falastiiniyiintu u adeegsan jireen Yuhuudda kale ee ku noolaa dhul ka baxsan Dhulkii Ballanqaadka.

Dynamic equivalent. Waa aragti ah tarjumaadda Baybalka. Tarjumaadda Baybalku waxay noqon karaa “erayba eray” iyadoo ay tahay in eray kasta oo Ingiriisi ah in laga helo Cibraaniyada amaba Giriigga, iyo iyadoo la raaco “cibaaroyinka” oon in badan la tix gelinin in eray walba loo helo mid u dhigma. Haddaba “dynamic equivalent” gu wuxuu u dhexeeyaa labadan, waana in si runa loo qaato qoraalka asalka ah, laakiin loo tarjumo si waafaqsan qaabka naxwe ahaaneed ee casriga ah iyo fadhiiinta erayada. Haddaba, falaqayn fiican oo ku saabsan aragtiyaha tarjumaadaha waxa laga heli karaa kitaabka ay qoreen Fee iyo Stuart ee *How to Read the Bible For All Its Worth*, p. 35 iyo Robert Bratcher Hordhaca uu ka bixinayo TEV.

Eclectic. Waxa loo adeegsaday xidhiidhka ay la leedahay canbaaraynta qoraal ahaaneed, waxaanay sheegaysaa ku celcelinta amaba doorashada qoraallada kala gedisan ee Giriigga si loo soo dhiraan dhirriyo qoraalka ugu dhow asalka. Waxaanay diidaysaa aragtida ah in qofkasta oo qoys la ah qoraallada Giriiggu uu haysto asalka.

Eisegesis. Waxay kasoo horjeeddaa exegesis ka. Haddii markaas exegesis ku uu yahay “raacitaanka” ujeeddada asalka ah ee qoraaga, kanina wuxuu noqonayaa “keenista” aragti ajnebi ah.

Etymology. Waa qaabka barashada erayga si loo helo macnaha asalka ah ee eraygaas. Marka halkan laga bilaabo waxyaalaha asalka ah ee loo adeegsaday si fudud ayaa lagu heli karaa. Haddaba marka la eego xagga fasiraadda Etymology gu maaha mid ka muhiimsan macnaha casriga ah ee erayga.

Exegesis. Waa qaabka loo raaco fasiraadda aayadaha. Macneheedna waxa weeyi “in la raaco” ujeeddada iyo fahanka qoraaga iyadoo lana raacayo iftiinka taariikh ahaaneed, suugaan ahaaneed iyo sida macnaha loogu dabiqli karo wakhtiga la joogo.

Genre. Waa eray asalkiisu yahay Faransiis isla markaana loogala jeedo noocyo badan oo qoraallo ah. wuxuu xoogaynayaa qaybinta qoraalka oo loo kala saaro: taariikhi, gabay, maahmaah, iyo nidaama amaba sharci ahaan.

Gnosticism. Aqoonta ugu badan een u leenahay ayaa waxay ka imanaysaa qoraallada Gnostic ga ee qarnigii labaad. Si kastaba ha ahaatee, fikradahani sidoo kale waxay jooheen qarnigii koobaad iyo intii ka horraaysay.

Waxa la sheegaa in kuwo ka mid ahaa caqiidooyinkii Valentian iyo Cerinthian Gnosticism ka qarnigii labaad ayaa waxay ahayeen: (1) waxa la taaban karo iyo ruuxu waxay ahaayeen kuwo isla xidhiidha. Waxa la taaban karaa waa shar ruuxunu wuu wanaagsan yahay, Ilaaha ruuxa ahina ma noqon karo mid si toos ah ula mida sharka; (2) waxa jira waxyaalo kasoo burqanaya Ilaah iyo sharkaba. Kan uguna bilowga iyo dhammaadka ahina waa YHWH Axdiga Hore oo ah kan sameeyay dunida (*kosmos*); (3) Ciise wuxuu ahaa mid ay wax kasoo burqadaan sida YHWH oo kale isla markaana wuxuu u ahaa mid u dhow Ilaaha runta ah. Waxa dadka qaar ay isaga gaadhsiiyaan heerka ugu sarreeya, laakiinse waxa hubaala inuu ka darajo hooseeyo Ilaah (Yooxanaa 1:14). Maadaama oo waxa la taaban karaa sharyahay Ciise muu haysan karin jidh bani aadan isagoo Ilaahna ah. Wuxuu ahaa ahaa ruux (1 Yooxanaa 1:1-3; 4:1-6); iyo (4) badbaadada waxa lagu helaa rumaysadka Ciise oo ay la socoto aqoon gaara taasi oo ah midda lagu yaqaano dadka gaarka ah. Aqoonta waxa loogu baahan yahay si loogu dhaafo duniadan. Sidoo kalena qaynuunka Yuhuuddu wuxuu u baahna sidii lagu gaadhi lahaa Ilaah.

Macallimiintii beenta ahaa ee gnostic gu waxay ku dhawaaqayeen labo waxyaalood oo iska kasoo horjeeda; (1) kuwo ka mida qaab nololeedku waxay ahaayeen gebi ahaanba kuwo aan la xidhiidhin badbaadada. Waxay iyaga badbaadada iyo ruuxuba kuwo la isugu soo ururiyo aqoon qarsoon oo la xidhiidha caalamka malaa’igaha (*eons*); amaba (2) kuwa kalana, qaab nololeedku wuxuu u ahaa mid u muhiim ah badbaadada. Waxay ku adkaysteen in qaab nololeedka qofku uu caddayn u yahay ruuxa dhabta ah.

Hermeneutics. Waxa weeyi eray loo adeegsado hagista, waxaanu leeyahay waxyaabo gaara oo la raaci karo iyo hadiyad. Quduusnimada hadiyo goor waxa ay leedahay labo muhiimadood: muhiimad guud ahaaneed iyo mid gaar ahaaneed, waxaanay tani ku xidhantahay noocyada kala duwan ee ah qoraallada laga helo Baybalka. Nooc kastaa haddaba wuxuu haystaa jidkiisa u gaarka ah, laakiinse waxay sidoo kale wadaagaan waxyaalo isku mida xagga fasiraadda.

Higher Criticism. Waxay ka timid fasiraadaha Baybalka iyadoo muhiimadda siinaysa dhacdooyinka taariikh ahaaneed iyo qaabka suugaan ahaaneed ee kitaabada Baybalka.

Idiom . eraygan lagu isticmaalay weedhan waxaa laga helaa dhaqano kalad duwun kuwaas oo macnahooda takhsuska ahi uuu yahay. Inaanay sarbeebayso macnaha caadiga ah ee qofka ma erayga. Sida tusaalayaashan asliga ah qaar kood: waxa ay yihiin sida “Taasi waxa ay ahayd mid aad u xun fiican “ ama “waad idishay” Kitaabkana waxaa ku jira odhaayadaas noocaas oo kale ah.

Elumination magacani waa magaca la siiyo fekerka in Ilaahay bani-aadanka la hadlo. Macnaha buuxa ee fekradan waxaa badiyaa qeexaya: (1) Muujin -----Ilaahay ayaa metalay taariikhda bani-aadanka., (2) Waxyi-----Wuxuu siiyey fasirka saxda ah ee falalkiisa iyo macnahooda oo uu u dhiibay niman uu doortay si ay u ugu qoraan bani-adaanka. (3) Iftiimin wuxuu soo diray Ruuxsa si uu bani-aadanka uga caawiyo inay fahmaan daahfurka.

Inductive. Tani waa hab ama sabab macquul ah oo shay khaas ah meel ka kaxaysa oo arrin kale ku darta habka waaqiciga ah ee sayniska casriga ah. tani waxa ay aas aas ahaan tahay arragtiddi Aristotle

Interlinear. Habkanani waxa weeyaan nadaam qalab cilmi baadhiseed oo u ogaanaya dadka aan akhrin Kitaabaku inay lafo guraan macnihiis iyo qaabkiisa. Turjumaada afka Ingisiisiga waxa ay ka dhigan tahay iyadii oo heer ilaa eray-ka eray looga soo qaadanayo luqada asal ah Kitaabka. Qalbakani waxa uu koobsadaa “lafo guris” aalad xaqiiq raadisa “oo marka afka Ingiriisiga ah la geliyo sheegaysa habka iyo qeexitaanka aas aasiga ay ku tahay afka Cibraaniga iyo Yuhuuda ”

Inspiration. Tani waa fekerka ah ina Ilaahay la hadlay bani-aadanka isaga oo ku hanuuniyaaya qoraayada Kitaabka inay si sax ah oo aan madmadow ku jirin u qoraan muujintiisa. Macnaha fekerka oo buuxa waxaa qeexa saddex weedhood: (1) Muujin- magacani waa magaca la siiyo fekerka in Ilaahay bani-aadanka la hadlo. Macnaha buuxa ee fekradan waxaa badiyaa qeexaya: (1) Muujin -----Ilaahay ayaa metalay taariikhda bani-aadanka., (2) Waxyi-----Wuxuu siiyey fasirka saxda ah ee falalkiisa iyo macnahooda oo uu u dhiibay niman uu doortay si ay u ugu qoraan bani-adaanka. (3) Iftiimin wuxuu soo diray Ruuxsa si uu bani-aadanka uga caawiyo inay fahmaan daahfurka.

Language of description. tan waxa ay xidhiidh la leedahay sarbeebaha ku qoran Axdiga Hore. Waxa ay ka hadashaa aduunkeena sida ay walxuhu ugu muuqadaan shanta dareeme. Maaha qeexitaan sayniseed ama loo lama jeedin caykaas inay noqoto.

Legalism. qaab fekar kan waxaa sal u ah aad xoog u saarista ama muhiimad siinta xeerar ama caadooyin diimeed. Waxa ay ka dhigan tahay in bani-aadanka wax qabadkiisu uu yahay sharciyo keenaya aqbalaada Ilaah. Waxa ay ka dhigan tahay xidhiidhka oo hoos loo dhigo korna loo qaado afcaasha gacmahu qabtaan, kuwaas oo labadooduba ah labada ha bee Xidhiidhka axdiga ee u dhexeeya Ilaaha quduuska ah iyo bani-aadanka

Lateral. Tani waa magac kale oo qoraal ahaan xooga saaraya nidaamyada taariikhiga ah ee qoraaladii hermeneutics ee Aniyokh. Waxa ay macnaheedu tahay in fasirka ay lug leeyihiin dadka caadiga ah ayna si cad macnaheedu ugu dhigan yihiin afka bani-aadanka, wallow haddana ay aqoosan tahay jiri taanka af maldahan.

Literary-genre. Tan waxa ay ku taxa luqdaa hababka kala duwan ee xidhiidhka bani-aadanka qaadan karo, sida gabayga, ama werinta taariikhiga ah iyo sheekooyinka. Nooc kasta oo suugaan ahi waxa uu leeyahay haan macno qarsoon u khaas ah oo lagu daray xeerka guud ee suugaanta qoran oo dhan.

Lateral- unit. tani waxa ay la xidhiidhaa fekradaha waaweyn ee Kitaabiga ah ee lagu laqasan yahay. Waxa ay ka koobnaan karaan aayado yar, sadaro, ama cutubyo. Waxa weeyaan qaybo isku filan oo leh oo ay bar dhexaad u tahay mawduuc.

Lower criticism. Eeg “Qoraaladaciladraadinta”

Manuscript. eray bixintani waxa ay la xidhiidhaa nuqulada kala duwan ee af ka gGiriiga ee laga helo Axdiga Cusub. Badiyaaba waxa ay u qabsan yihiin qaybo noocyo kala duwan oo (1) shayada ay ku qoran yihiin (Papyrus, saan,) ama (2) Qaabka qoraalada laftooda (Xarafaha waaweyn oo dhan ama qoraalada is dabo taxan) waxaa loo soo gaabiyey “MS” (keli) ama “MSS” (Jamac).

Masoretic –Text . Tani haddaba waxa ay ku saabsan tahay qoraaladii gacanta lagu qoray qarnigii sagaalaad CD ee qoraalada Cibraaniga ah ee Axdiga Hore ee ay iska soo dhaxleen facyow aqoonyahano Yuhuuda ah. kuwaas oo ka kooban qoraalo qodobaysan iyo iyo qoraalo kale oo macnaynaya. Waxa ay qaab ahaan tahay aas aaska qoraalada ku qoran Kitaabkeena Ingiriisiga ah ee Axdiga hore waxa ay waafaqsan yihiin qoraalada Cibraaniga ah MSS, khaas ahaan Ishaaciyaah ee caanka ku ah duubkii laga helay bada dhimatay. Waxaa loo soo gaabiyaa “MT”

Metonymy. Tani waa hadal maldahan oo magac shaylahaa loo adeegsaday inuu metelo shay kale kuwaas hore xidhiidh la leh. tusaale ahaan, “Kildhigu waa karayaa” dhaba ahaan manaheedu yahay “biyaha ku jira kidhigu waa ay karayaan”

Moratorium- Fragments. Tani waa liiska buugaagta ku jira laga reebay Axdiga Hore waxaa lagu qoray Rooma ka hor 200 CD. Waxaanay sheegayaan macno la mid ah todobaya iyo labaatanka buug ee Axdiga Cusub Madahabta Borosatanka. Waxa ay si cad u tusaysaa in kaniisadihii gudaha ee qaybaha kala duwan ee boqortooyadii Rooma “ay is ficil ah u dhigeen liiskii taxanaha ka hor kulankii weynaa ee golaha kaniisadu ay isagu timi qarnigii afraad”.

Natural revelation. Tani waa heer ka mid daahfurka Ilaah u daah furo dadka waxa ay ku lug leedahay nidaamka dabiiciga ah (Rooma1:19-20) iyo garashada niyad ahaaneed. (Rooma 2:14-15) waxaa kale oo laga hadlay (Sabuurada 19-1-6) iyo (Rooma 1:1). Wax ay cadaynaysaa muujinta khaaska ah ee habka khaaska ah ee uu Ilaahay isugu daahfuray Kitaabka. Iyo Ciisihii reer Nasareet ee awooda badnaa.

Wax baris diimeedka caynkan ah waxaa mar labaad muhiimada lagu siiyey “dunidii hore” dhaqdhaqaaq saynis ah oo ka dhex jiray masiixiyiinta dhexdooda (Tusaale, qoraaladii GUJH Ross) waxa ay carabka ku adkeeyeen qoraalka noocan ah ee sheegaaya inuu dhulku yahay abuurka Ilaah ee dhabta ah.

Dabeecadu waa albaab u furan oo ku saabsan aqoonta ama cilmiga Ilaah waxa ay ka duwan tahay muujinta kale (eek u taala Kitaabka). Waxa ay u ogolaataa saynisyahanada casriga ah fursad iyo xoriyad ay ku sameeyaan cilmi baadhis, hanaanka dibiiciga ah. aniga rajigayga waxa ay ala tahay fursad cajiiba inaan arko sayniska casriga ah ee dunida galbeedka.

Nestorianism. Nestorius Nastoriyas waxa uu ahaa odayada qarnigii sanaad waxa lagu soo tabo baray antiyokh dii Suuriya wuxuuna cadeeyey in Ciise lahaa laba dabeecadood mid bani-aadan kaamila iyo mid Rabbaani buux ah. arrintan waxaa duway Otohogoska kii Axkenderiya oo ku salaysan aragti hal dabeecad keli ya ah. Masreyos waxa uu ka walaacsanaa (hooyada yare e Ilaaha ah. ee laga dhigay maryan Mistooriyas waxaa ka hor yimi Cyril kii alaskaderiya iyo qoraaladiisii dahsoonaa iyo tababarkiisii ku soo qaatay Antioch ayaa waxa ay u dub dhaxaad u ahaayeen. Naxwaha qoraalada taariikhiga ah iyo argtiyaha fekerka kitaabka, Xiligii ay alxcanderiya ahayd xarunta afarta gees (allegorical) ee iskuulka tafsiirka. Kama damabyntiina Misteriyos waa laga eray xafiiskii waana la mastaafuriyey

Original Author. tani waxa ay ku saabsan tahay qoraaga dhabta ah-qoraayada qoraalka.

Papyri qoraalada noocan ahi waxa ay ku qoran yihiin shayo laga keenay Masar. Waxa laga sameeyey alwaax webiga ka baxda taasi oo ay ku qoran yihiin nuqulada ugu dada weyn ee Axdiga Cusub eek u qoran afka Giriiga

Parallel passages. Waxa ay qayb ka tahay fekrada ah in Kitaabka oo dhammi yahay mid Ilaah soo dejiyey oo aan fasirkiisana ka mid noqon karaan curisyo aan la wada fahmi Karin micnahooda. Tani waxa kale oo ay tahay mid caawisa in la helo macnaha cad ee Curis leeyahay ee ku saabsan mawduuc iyo sidoo kale qoraalada kale ee ku saabsan mawduucyo kale.

Paraphrase. Tani waa magaca sheekooyinka tujumaada eek u yaala Kitaabka. Turjumaada Kitaabka waxaa loo arki karaa hanaan is dabataxan ka “eray ilaa eray” loo soo tabiyey, halka erayga Ingiriiska ahi ay tahay inuu soo ban dhigo xigashada eray kasta oo Cibraani anma Giriiga “Xigasho” halka fekrada oo qudha la turjumay xidhiidh sidaas lama sii laha asalka weedha ama erayda asalkoodii. Ladaas arragtiyoo d dhexdooda “waxaa jira isu dhignaansho fir fircoon ”

Kaas oo isku daya inuu si qoto dheer u qaato qoraaladii asalka ahaa laakiin u turjuma qoraalada naxwo ahaan iyo sarbeeb ahaanba. Run ahaatii falaqan aad u waagsan oo ku salaysan argtiyahaas kala duwan ee fasirka waxaa laga heli karaa buugga ama qoraalada Fee iyo Stuurta magacooduna ahaa how to read the Bible for all its Worth, p. 35

Paragraph. tani waxa ay tahay aas aas taas oo ah mid lagu xidhay ujeedooyinka laga leeyahay cutubada. Tani waxa ay ka mid tahay badhtamaha ee lagu horu mariyo. Hadii aan sii joogno oo aan guud ahaan ba rumaysano. Kuwan wax baadhayaa waxa ay lumiyeen waxii hore ee uu qoray qoraaga ujeedadiisa

Parochialism. kuwani waxa ay la xidhiidhaan ay aas aas ahaan ay iska xidheen kuwa aad ugu fekera kuwa aqoonta u leh barashada Ilaah-iyo dhaqamada qaybahooda.

Paradox. Hadaba kuwani waxa ay la xidhiidhaan runta taas oo u muuqata inay is burinayaan, ilaa iyo hadda labadub waa run. in kasta oo mid walba kan kale ka taxadaraayey. Marka aan eegno qaab ka guud ahaan taas oo ay soo ban dhigayaan labad dhinacba. In ta badan Kitaabka ayaa runta soo bandhigaaya marka aan eegno qoraaldii hore (micne ahaan) qaybahoodii. Waxayaabaha Kitaabiga ah ma aha qaar laga soo dejiyey xidigaha. Laakin waxaa jira qiyaaso ay sameenayaan xidiguha.

Plato. Nin kaasi waxa ahaa mid ka mid ahaa dadkii mufakariinta ahaa ee Giriiga. Wuxuuna ahaa nin aad iyo aad saamayn iyo isbedelo ugu yeeshay marka aan fiirni Kaniisadii hore iyo iyo aqoonayahadii reer Alexandria, ee Masar, ka dib Augstains. Waxa uu soo jeediyey wax kasta oo dunida korkiisa ayaal inay yihiin kuwo ku lug leh meereey kala taas oo ay isku eeg yihiin qaab ahaan xagga Ruuxa. Kuwa mufakafiinra ahi waxa ay ka war bixiyeen Plato “habab –iyo fekrado ” inay yihiin waxaabha Ruuxiga ah ee dunidan

Presupposition. Tani waxa ay la xidhiidhaa sidii aynu hab ahaan inagu wax u fahanay. Marar badan ayaan wax xukunaa marka aan eegno inagu ka hor inta ay naan ka war bixin waxa ay leeyihiin qoraalada qudhooda. Xitaa saadaalintu la garamaayo sida ay u ku salaynsan xiliyadii hore waxa ay qiyaasayeen ama ay farmi karayaan

Proof-texting. Tani waxa ay tahay iyada oo la soo qaadanaayo sidi loo turjumi laha qoraalada iyada oo la soo qaadanaayo aayado iyada oo la fiiriyo qoraala loona fiirisanaayo xitaa, qabo dheedheer oo ka mid ah qoraaladaas qayb ahaan. Aayadahaasi waa qaar laga saaraayo wixii hore ee uu oqoray qoraagu kuwaas oo inta badan ku yeelanaysa saamayn sidii aan u cadayn lahayn qofku fekradaha uu qabo in kasta oo ay halkaas marka aan joogno Kitaabku awooda leeyahay ee maha qoraaga.

Rabbinical Judaism. Xiligani waxa uu ahaa xiligii nolosha dadka Yuhuuda ah ay bilaabantay inay u qaxaan dhulkii (586-538).

Hadabab kii ay wadaadadu kaas oo macbudka joogan in laga saaray. Markaas ayaa kuwii khaaska ahaa macbudada ay samayn ku yeelatay dadkii Yuhuuda ahaa noloshooda. Kuwaasina waxab ay ahaayeen sida dhaqanka yuhuuda mid udub dhexaad u ah. dhaqan ahaan, is weheshi ahaan, iyo caabudidi iyada oo bara shada kitaabkuna noqday is weheshiga xagga aduunka diinta iyo nolosha. Ciise Masiix, maalin taasi “diinta iyo qoraalada” taasna waxa ay ahayd tusaalaha wadaadada kaas oo ka dhacay Magaalad juurasaalem sannadii A:D hab qoraalkani waxa uu ka muuqanayaa ayaadahaas iyada oo ay Ilaalinayso hogaaminta xagga dhaqanka

iyo diinta Yuhuuda iyo noloshooda. Tani waxa ay ahayd dabeecad taas oo la sameeyo sharci ahaan iyada oo laga soo turjumaayo Tawaraada sidii aan hore ugu soo aragnay waxii ku saabsanaa dhaqanka (Talmud).

Revelation. Kani waxa weeye magac kaas oo oo Ilaahay si mucjiso ah ugala hadlay dadkiisa ferad dhamaystiran ayaa inta badan lagu xusay halkan saddex jeer “(1) Muujin -----Ilaahay ayaa metalay taariikhda bani-aadanka., (2) Waxyi-----Wuxuu siiyey fasirka saxda ah ee falalkiisa iyo macnahooda oo uu u dhiibay niman uu doortay si ay u ugu qoraan bani-adaanka. (3) Iftiimin wuxuu soo diray Ruuxsa si uu bani-aadanka uga caawiyo inay fahmaan daahfurka.”

Semantic field. Tani runtii waxa ay la xidhiidhaa asal ahaan macno kaas oo la xidhiidha erayada tani runtii waxa ay ku salaysan tahay kala duwanaanta erayada in ay kala duwan yihiin macno ahaan qoraaladaasi.

Septuagint. Kani waxa weeye magac lagu tutjumay luqada Giriiga iyo weliba Cibraaniiga Kitaabka Axdiga Hore.dhaqan ahaan ayaa waxa uu odhanayaa kuwaasi waxa ay ahaayeen kuwo la qoray ilaa iyo todoba cisho. Kuwaasina waxa ay ahaayeen aqoon yahanadii dhexdhexaadka ahaa ee Alaxkanderiya Masar. Maalintu dhaqan ahaan waxa ay ku dhowdahay 250 C.H. (sida runtii ah waxaa suuro gal ah inay suuro gal tahay intan lagu dhameeyey mudo ka badan boqolaal sano)kani waxa uu ahaa tujumaadii kaas lahaa calaamado sababta oo ah (1) waxa ay ina siinaysaa qoraaladii xiliyadii hore marka aan qoraaladaas bar bar dhigno kuwii Masoretiska qoraaladii cibraaniyiinta (2) tani waxa ay ina tusaysaa inaan fahano Yuhuuda iyo turjumaadahooda qarnigii saddexaad ilaa iyo kii labaad Ka hor C.H. (3)Tani waxa ay ina siinaysaa sida dadka Yuhuuda ah inay diideen Ciise guud ahaanba, ta cadaynaysaana waa “LXX”

Sanaiticus Kani waxa uu ahaa qoraalada Giriiga ee Qarnigii afraad C.H. tana waxaa helay nin aqoon yahayn ahaa oo Garamal ah Tishendorf, Meeshii St. Ctherine, s gurigii iyo Macbudkii Jabel Musa. Dhaqan ahaan waxa ay fadhiisan jireen Mt, Sinia. Taasina waxa ay ahayd mid laga soo qaabeeyey warqadii ugu horaysay marka la fiiriyu luqada Cibraaniyada taas oo loogu yeedho “*Xaruuf*” (N) waxa ay ka kooban tahay laba arimood oo laga helaayo Kitaabka Axdiga hore iyo Axdiga Cusub. Kuwaasina waxa ay ahaan kuwa ugu muhiimsan marka aan eegno taariikhdiisii hore MSS.

Spiritualizing. Tani waxa ay ahayd xiligii ay arintu goonida u ahayd qaabkii looga qaadi lahaa waxyaabaha taariikhiga a. iyo qoraaladu waxa ay leeyihiin micne ahaan inaga oo fiirinayna turjumaadaha ay ku salaysan yihiin kala duwanaanshahooda.

Synonymous. Waxa ay la xidhiidhaa mar xaladihii saxa ahaa mid waliba na waxa uu lahaa macne u kaas la mid ah (in kasta oo aanay sida xaqiiqada ah aanay ahan laba eray kuwaas ooh ore u dhamaystirmay isku noqonaayey). Kuwaasi waxa ay ahaan qaar aad isugu dhow kuwaas oo xidhiidh leh kuwaas oo la isku bedeli karo hadii kala weedhaha qaar ayaa waxa ay luminayaan micnahooda. Xitaa waxa kale oo loo isticmaalaa in loo qaabeeyo hal iyo saddex ha boo ka mida Cibraaniyiintooda tusaalayaashooda. Tan macnaheedu waxa weeye inay jiraan laba sadar kuwaas oo samaynaaya macno isku mid ah oo run ah. (cf, ps 197:9).

Syntax . Kani waxa weeye eray Giriiga kaas oo xidhiidh la leh dhismaha weedhaha. Iyda oo la xidhiidha sida ay weedhu isugu xidhan yihiin. Isla markaasina ay samaynaayaan fekrad dhamaystiran.

Synthetical. Kuwani waxa ay yihiin saddex arrimood oo la xidhiidha noocyada gabadyada ee Cibraaniyiinta. Kuwaasin waxa ay ka kooban yihiin gabayo kuwaas oo mid ba uu mid kale dhisaayo, iyaga oo macne samaynaaya. Mararka qaar ayaa “waxaa loogu yeedhaa” “cimilada” (cf, ps. 103:3)

Systematic Theology. tani waa arrimo kuwaas oo la xidhiidha kuna tiirsan turjumaadaha Kitaabka kuwaas oo lagu aqoonsanaayo xaalado macquula dabeecad ahaan. Tani waa arin suuro gal ah, halkii ay ka noqon lahayd wax iska taariikhiya. Taas oo ay soo jeediyeen kuwo faro badan oo Masiixiyiinta oo ku talax tegay barshada fekradaha kala duwan. (sida Ilaahay, Bani-aadanka, dembiga iyo badbaadada Iwm).

Talmud Waxa aan halkan ka arkaynaa wax oo cadaymo ah kuwaas oo ahaa asal ahaan dhaqanada yuhuuda. Ilaahay ayaa waxa uu siiyey Yuhuuda inuu kula hadlay Muuse buutii Siinaay. Tani waxa ay ahayd arrin runa oo xigamad lahayd sannado faro badan macalimiinta dadka Yuhuuda ah. waxa jira laba qoraal oo ah Talmud iyo kuwii Baabylonka mudo kooban, intii ayna dhamaystirn Falistiiniyiintii.

Taxtual criticism. Kani waxa uu yahay qoraalo kuwaas oo laga baranaayo Kitaabka Quduuska. Qoraaladaasi waa mid iska caadiya in la eedeeyo sababta oo ah lama hayo qoraalo asala kuwii la helayna waa ay kala duwanaayeen. Tani waxa ay inagu qasbaysaa inaan u trjuno inaan wixii hore ku laabano. (sida ugu dhow ee suuro galka ah). asal ahaan erayadaasi waxa ay ahaayeen kuwo laga soo sawiray Axdiga Hore. Kuwaasna banaa waxaa loogu yeedhaa “eedaynta ugu hoosaysa”

Taxtus Recept. Qaabkani waxa uu horu marinayaa habkii Elzervir qoraalkaas oo ahaa Greek NT sannadii 1633 A.C. runtii tani waxa ay ku salaynadu inay ka yimaadeen Giriiga Kitaabka AC kaas oo mid ka dib lagu soo saaray turjun ahaan luqada Giriiga in a Latin versions of Erasmus (1546-1559) (1624-1678). *Introduction to the textual Criticism of the New Testeman*, p. 27, A.T Robertson ayaa waxa uu yidhi “qoraaladan la yiraahdo Byzantine qoraaladaasi inta badan waxa aan heli karaa qoritaankooda” haddaba qoraalada Byzantine waxa ay ahaan kuwo qiimo lahaa marka aan eegno ugu yaraan saddexdii qoys kuwaas oo berigii hore Giriiru wax ku qori jireen (western, Alxcandria, Byzantine) waxa ay kuwani ka koobnaayeen kuwo badan oo qalad ka buuxo qarniyo hore qoraaladaas jiray. Haddaba si kastaba ha ahaatee, A.T Robetson ayaa xitaa waxa uu yidhi “Marka aan eegol qoraaladii la qoray waxa jiray waxyabo cadaynaya inay ahaayeen qoraalaasi kuwo jira” (P.21) kuwani waxa ay ahaayeen qoraalo Giriirga dhaqankiisa ah gaar (gaar ahaan Erasmus daabacaadii saddexaad sannadii n1522) habkaasina waxa uu ku salaysnaa Kitaabka King James Version of 1611 A.D

Torah. Tani waxa ay tahay hab “waxbarid” oo Cibraaniyiinta tan in yar oo ka mid ahi waxa ay ka soo jeedeen wax baridii Muuse (Bilowgii ilaa iyo Sharciga Kunoqoshadiisa) waxa ay ahaayeen yuhuuda kuwa inta badan awooda iska lahaa kuwaas oo ka la qaybnin jiray Cibraaniyiinta iyo Canon.

Typological. Kuwani waxa ay ahaayeen hab khaas ah kaas oo wax loo turjumo. Inta bana kuwan waxaa laga helayaa Kitaabka Axdiga cusub. Fariinahaasna waxaa looga jeeday calaamado suuro gal ah. ahadaba fariinta caykan ahi ee baadhitaanku waxa ay ahayd badanaa waxyaabaha ugu badan ee aas aaska u ahaa habkii Alxcandria. Sababtuna waxa ay ahayd waa ay dhaleecayn jireen fekradaha caykan oo kale ah iyo turjumaadaha. Mid haddaba ka mid ah tusaalayaashan oo aan isticmaalo lagana helaayo Kitaabka Axdiga Cusub.

Vaticanus. Kani waxa uu ahaa qoraaladii Giriiga ilaa iyo qaringii A.D tana waxa laga helayaa Maktabka faatikaanka. Asal ahaan waxa uu ka kooban yahay Kitaabka Axdiga Hore. Sida qoraaladii la helay ee Axdiga Cusub. Haddaba si kastaba ha ahaatee, qaar kuwaas ka mid ah ayaa lumay. (Bilowgii Sabuurrada, Cibraaniyada, iyo wadaadkii Philemon iyo Muujintii). Kuwani waxa ay ahaayeen qoraalo ina caawinaaya oo aad faa, iido u leh lana garan karo eraydii ay asal ahaan ka yimaadeen sawir ahaan.

Vulgate. Kani waxa uu ahaa magacii Jerimiyaah kaas oo lagu turjumay Kitaabka luqada taaliinka. Kuwaasina waxa noqdeen aas aas ama “qaar caadiya” Waxaana lagu turjumay kaniisada Catholic Roman. Xiligii la sameeyena waxa uu ahaa sannadii 380s A.D

Wisdom literature. Kani waxa uu ahaa noo ka mid ah qoraalada oo caadi ahaa xiligii hore una dhowaa dhinaca bari. (dunidan casriga ah). Waxa ay ahayd mid asal ahaa lagu tijaabiyey sidii ay jiinka cusubi loogu hogaamin lahaa nolol taas oo ah mid ay iyaga oo guulaystay ku noolaanayaan noloshopoda sida gabayada, maahmaaha, iyo maqaalada. Tani waxa ay ku wajahnady mid kasta iyo sidii loola xidhiidhi lahaa bulshada. Tani ma aha mid loo isticmaalayo taariikh. Laakiin waxa ay ku salaysan tahay nolosha iyo waayo aragnimadeeda iyo baadhi taanada. Kitaabka Ayuub iyo Gabaygii Sulaymaan waxa ay u ekeayd inay soo bandhigayso caabudaad taas oo la caabudayo YHWH, laakiin fekradan xagga diimaha ahi ma aha mid ay isku raacsan yihiin kuwo kasta oo ka mid ah bani-aadanka iyo waayo aragnimadooda xili kasta.

Haddaba sida nooc kastaaba ugu bilowdo runta guud ahaanta ah. haddaba si kastaba ha ahaatee, noocani ma aha mid lagu isticmaalay xaalada kasta oo aas aasiya.

Hadaba waxa ay ina weydiinayaan si qotodheer su, aal taas oo ku saabsan nolosha bani-aadanka. Inta badana waxa ay bedelaan diimaha iyo dhaqanka iyo fekradahooda. (Ayuub iyo Cesraa). Waxa ay leeyihiin hab kaas oo isku dheeli tiran iyada oo dareen ahaan si fudud looga jawaabi karo nolosha iyo qorshayaasheeda.

World Picture and worldview. Halkan waxaa jira qaab aan wax isku bar bar dhigi karo. kuwaasina waxa ay yihii labadan fekradood kuwaas oo la xidhiidha abuuritaanka. Marka aan eegno marxaladaha “sawirka dunida” waxa uu la xidhiidhaa “sidi” ay waxyaabo kala duwani “feradaha dunida” ay ula xidhiidhaan “Waa kee ” iminka xaaladahan waxa aan si cad ugu turjumaynaa oo aynu ka helaynaa Kitaabka Bilowgii 1-2 kuwaas oo si khaas ah ugu hadlaaya asal ahaan ka uu yahay, maha laakiin, sida abuurida.

YHWH. Kani waxa uu yahay Axadi magaca Ilalah marka aan eegno Kitaabka Axdiga Hore. Taas oo lagu aqoon sanaayo Baxniintii 3:14. Tani waxa ay tahay ISLA WADAAGIDII xaaladihii kuwii Cibraniyiinta “inay ahaadaan” kuwa yuhuuda ahi waxa ay ka baqayeen inay magaca ku dhawaaqaan. Ugu yaraan waa ay ka xumaadeen, sidaasi daraadeed, waxa ay isku dhiibeen Cibraaniyadii xiligii Adoinia “sayid” tani waa sida ay Axdiga kaas oo magac ahaan lagu turjumay Ingiriisi.

LIFAAQA AFRAAD

ODHAAH CAQIIDO AHAANEED

Anigu si gaar ah uma danaynayo rumaysad ama caqiido. Waxaa door bidayaa in baybalka qudhiisa. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waan xaqiiqsanahay in hadalka ku saabsan rumaysadka ee kuwa aan aadka ii aqoon ay ka fogaadaan in ay qiimeeyaan marka ay dhinaycayga caqiido ahaaneed eegaan. Xilligeennan ay dhagarta iyo qaladaadka. Soo koobiddan fiqigaygu waxa uu sheegayaa.

1. Baybalka, Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub labadaba waa waxyiga tooska ah, ee aan dhicidda lahayn, oo ah awood adduunka weligiis ah ee xukunka Ilaah. Waa muujinta Ilaah oo ay qoreen dad Ilaah siiyey awood xidhiidh oo Ilaah siiyey iyaga. Waa meesha aan ka helno runta cad ee ku saabsan Ilaah iyo ujeedkiisa. Sidoo kale waa runta rumaysadka iyo falimaha Kaniisaddiisa.

2. Waxaa jira Ilaaha keliya ee ah, madaxfurtaha, abuuraha, aan dhammaadka lahayn. Waa abuuraha wax walba, wax la arki karo iyo wax aan la arkin intaba. Isaga naf ahaantiisa ayaa jacaylkiisa iyo daryeelkiisi awgiis is muujiyey in kastoo isagu yahay xaq iyo caadil. Saddex shaqsiyad oo kala duwan ayuu nafsad ahaantiisu isu muujiyey” Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Qudduuska ah, kuwaasoo kala gaar ah haddana hal isku ah naf ahaan.

3. Ilaah adduunkiisa Isaga ayaa xukuma. Waxa uu uunkiisa u hayaa labadaba qorshe weligiis ah oo aan is beddel lahayn iyo mid shaqsi ah oo diiradda saaraya aadanaha doorashadooda xorta ah. ma jiraan wax dhici kara ogaanshaha iyo oggolaanshaha Ilaah la’aantood, iyadoo ay sidaas tahay ayuu haddana oggol yahay labadaba, malaa’igaha iyo aadanaha doorashooyinkooda. Ciise waa Nin Ilaah Doortay, dadka oo dhanna isaga ayey ku dhex dooran yihiin. Ogaanshaha Ilaah u sii leeyahay dhacdooyinka kama naaqusinayso aadanaha in ay xaqiiqsashada qorniinkii horay loo qoray. Dhammaanteen waxa aan masuul ka nahay fakarradeenna iyo camalladeenna.

4. Aadanaha, inkastoo laga abuuray aragga Ilaah oo ay dembi xor ka yihiin, haddaba iyaga ayaa doortay in ay Ilaah ka fallaagoobaan. In kastoo quwad iyaga ka sarraysa ay jirabtay, Aadan iyo Xaawo iyaga ayaa masuul ka ahaa doonistood naf ahaaneed. Fallaagonimadoodii ayaa aadanaha iyo uunka saamaysay. Ilaah naxariistiisa iyo nimcadiisa ayaan uga baahan nahay labadaba xaaladeenna guud ahaaneed ee Aadan nooga timid iyo doorashada fallaagonimadeenna shaqsi ahaaneed.

5. Ilaah macne cafis iyo dib u soo celin ah ayuu siiyey aadanihii dhacay. Ciise Masiix, Ilaah Wiilkiisa aan lala midka ahayn ayaa noqday aadane, isagoo ku noolaaday nolol aan dembi lahayn, oo dhimashadii uu booskayaga ku galay, ayaa waxa uu ku bixiyey dembigii aadanaha. Waa jidka qura ee soo laabasho iyo hehelnimo lagula yeelan karo Ilaah. ma jirto waddo badbaado oo kale, oo aan ka ahayn in loo soo maro shaqadiisii dhammaystirantay.

6. Dhammaanteen waxaa si shaqsi ahaaneed waajib noogu ah in aan deeqda Ilaah ee cafiska iyo dib u soo celinta ku helno Ciise Masiix. Tan waxa ay ku kaamilantay doonista runta ah ee ballammadii Ilaah noo soo maruyey Ciise Masiix iyo doonista rajada leh ee dembiga la og yahay.

7. Dhammaanteen waxa aan si buuxda cafis iyo dib u soo noqosho ugu helaynaa aaminista Masiixa iyo ka tawbadkeenista dembiga. Arrintu si kastaba ha ahaatee, caddaynta xidhiidhkan cusub waxaa lagu dhex arkayaa nolosha is beddeshay, ama is beddelaysa. Hadafka Ilaah ee ku aaddan aadanaha ma aha oo qura in ay maalin uun galaan jannada, laakiin u ekaanta Masiixa oo hadda ah. Kuwaa sida dhabta u haysta madaxfurashada u haysta, in kastoo ay si aan ula kac ahayn u dembaabaan, waxa ay noloshooda ku soo wadaan rumaysad iyo tawbadkeen.

8. Ruuxa Qudduuska ahu waa “Masiix kale.” Waxa uu adduunka u joogaa in kuwa lumay uu Masiixa u soo hoggaamiyo oo uu kuwa badbaadayna u ekaanta masiixa ku horu mariyo. Hadiyadaha Ruuxa waxaa lagu dhex bixiyaa badbaadada. Waa noloshii iyo adeeggii Ciise oo lagu dhex qaybiyey jidhkiisa, kaniisadda. Hadiyadaha oo aasaas ahaan ah aragtiyada iyo ujeedooyinka Ciise ayaa waxa ay u baahan yihiin in ay soo saaraan midhaha Ruuxa. Ruuxu waa mid u firfircoon maalmahennan dhexdooda sidii uu waqtiyadii baybalka ahaa.

9. Aabbaha ayaa Ciise Masiixii dhimashada ka soo sare kacay ka dhigay xaakinka wax kasta. Adduunka ayuu ku soo laaban doonaa si uu u xukumo aadanaha oo dhan. Kuwa Ciise aamina ee magacooda lagu qoro buugga iftiinka ee nolosha waxa ay soo noqoshadiisa ku heli doonaan jidhkooda aammaanta ee weligii ah. Isaga ayey weligood la joogi doonaan. Ha yeeshee, kuwii diiday in ay ka jawaabaan runta Ilaah way go’naan doonaa farxadda wheel la ahaansha Ilaaha Qaaddirka ah. Waxaa iyaga lala xukumi doonaa shayddaanka iyo malaa’igihiiisa.

Tani sida hubaasha ah ma aha mid ebyan qma kaamil ah laakiin waxaan rajaynayaa in ay idin siin doonto dhadhanka fiqi ahaaneed ee qalbigayga ku jirta. Waxaan jeclahay hadalka ah”

“Aasaasyada ku jira—midnimada—dheeraad—xorroyad, wax kasta-- jacayl”